Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta Rasmiga ah
الرسمية الجريدة
Official Bulletin

EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Sanadka 10aad **Muqdisho** **2023**

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN SANADLE

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD
TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADLE

2023

SHARCI LR. 002 Taariikh: 08/03/2023
ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA KORONTADA **Bog 1**
SHARCI LR. 003 Taariikh: 08/03/2023
ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEED NABADSUGIDDA IYO SIRDOONKA QARANKA **Bog 24**
SHARCI LR. 004 Taariikh: 08/03/2023
ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA CUNAQABATAYNTA MAALIYADEED EE CAYIMAN **Bog 42**
SHARCI LR. 005 Taariikh: 20/03/2023
OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA XOGTA DADWAYNAHA **Bog 51**
SHARCI LR. 006 Taariikh: 20/03/2023
OGOLAANSHO ANSAXINTA SHARCIGA SOCDAALKA SOOMAALIYA **Bog 83**
SHARCI LR. 007 Taariikh: 20/03/2023
OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA LA-DAGAALANKA ARGAGIXISADA **Bog 108**
SHARCI LR. 008 Taariikh: 20/03/2023
OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HORUMARINTA IYO MAARAYNTA KALLUUMAYSIGA SOOMAALIYED **Bog 142**
SHARCI LR. 009 Taariikh: 20/03/2023
OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA AQOONSIGA IYO DIIWAANGALINTA DADWAYNAHA **Bog 228**
SHARCI LR. 010 Taariikh: 20/03/2023
OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIYEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA **Bog 241**
SHARCI LR. 011 Taariikh: 20/03/2023
OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA **Bog 269**
SHARCI LR. 012 Taariikh: 20/03/2023
OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED **Bog 278**

XEER MADAXWEYNE LR. 063 Taariikh: 02/02/2023
MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BOOLISKA SOOMAALIYEED & XIL KA QAADISTA TALIYIHII HORE CIIDANKA BOOLIISKA SOOMAALIYA **Bog 291**
XEER MADAXWEYNE LR. 70 Taariikh: 03/01/2023
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA CAAFIMAADKA & BADQABKA BULSHADA SOOMAALIYEED **Bog 291**
XEER MADAXWEYNE LR. 71 Taariikh: 05/02/2023
WAREEJIN SARKAAL **Bog 293**
XEER MADAXWEYNE LR. 72 Taariikh: 07/01/2023
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWAYNAHYA EE KA HORTAGGA IYO LA-DAGAALANKA FIKRADAHA XAGJIRKA ah ee RABSHADAHA WATA (PCVE) **Bog 294**
XEER MADAXWEYNE LR. 73 Taariikh: 10/01/2023
MAGACAABIS MADAXA WADA-XAAJOODKA GANACSIGA EE URURKA GANACSIGA ADDUUNKA **Bog 295**
XEER MADAXWEYNE LR. 74 Taariikh: 16/01/2023
MAGACAABIS NOOTAAYO **Bog 296**
XEER MADAXWEYNE LR. 75 Taariikh: 16/01/2023
MAGACAABIS LA-TALIYE KU-XIGEENKA AMNINGA QARANKA **Bog 297**
XEER MADAXWEYNE LR. 76 Taariikh: 23/01/2023
DALACSIIN KORMEERE AQOON-YAHANAD AH **Bog 298**
XEER MADAXWEYNE LR. 77 Taariikh: 28/01/2023
MUSHAARKA & GUNNOOYINKA MA'SUULIYIINTA MAAMULKA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA **Bog 299**
XEER MADAXWEYNE LR. 78 Taariikh: 28/01/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 301**
XEER MADAXWEYNE LR. 79 Taariikh: 28/01/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 302**
XEER MADAXWEYNE LR. 80 Taariikh: 28/01/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 303**

XEER MADAXWEYNE LR. 81 Taariikh: 28/01/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 304**
XEER MADAXWEYNE LR. 82 Taariikh: 28/01/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 305**
XEER MADAXWEYNE LR. 83 Taariikh: 28/01/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 306**
XEER MADAXWEYNE LR. 84 Taariikh: 06/02/2023
DALLACSIIN SARAAKIIL **Bog 307**
XEER MADAXWEYNE LR. 85 Taariikh: 16/02/2023
MAGACAABIS HANTI-DHOWRKA GUUD EE QARANKA **Bog 310**
XEER MADAXWEYNE LR. 86 Taariikh: 04/03/2023
MAGACAABIS LA-TALIYAHA ARRIMAHA DIBADDA & ISKAASHIGA CAALAMIGA **Bog 312**
XEER MADAXWEYNE LR. 87 Taariikh: 11/03/2023
MAGACAABIS HOWLWADEENADA GARSOORKA MAXKAMADDA CIIDANKA QALABKA SIDA **Bog 313**
XEER MADAXWEYNE LR. 88 Taariikh: 11/03/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 315**
XEER MADAXWEYNE LR. 89 Taariikh: 11/03/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 316**
XEER MADAXWEYNE LR. 90 Taariikh: 11/03/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 317**
XEER MADAXWEYNE LR. 91 Taariikh: 11/03/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 319**
XEER MADAXWEYNE LR. 92 Taariikh: 11/03/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 321**
XEER MADAXWEYNE LR. 93 Taariikh: 11/03/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 323**
XEER MADAXWEYNE LR. 94 Taariikh: 11/03/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 325**
XEER MADAXWEYNE LR. 95 Taariikh: 11/03/2023
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 327**

XEER MADAXWEYNE LR. 96 Taariikh: 11/03/2023
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO **Bog 329**
XEER MADAXWEYNE LR. 97 Taariikh: 11/03/2023
MAGACAABI HOWL-WADEENADA GARSOORKA MAXKAMADDA CIIDANKA QALABKA SIDA **Bog 331**
XEER MADAXWEYNE LR. 98 Taariikh: 15/03/2023
DALLACSIIN SARAAKIIL **Bog 333**
XEER MADAXWEYNE LR. 99 Taariikh: 18/03/2023
MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA BANAAN EE DIB-U-EEGISTA & HIRGALINTA DASTUURKA **Bog 334**
XEER MADAXWEYNE LR. 100 Taariikh: 22/03/2023
MAGACAABIS NOOTAAYO **Bog 336**
XEER MADAXWEYNE LR. 101 Taariikh: 22/03/2023
MAGACAABIS NOOTAAYO **Bog 337**
XEER MADAXWEYNE LR. 102 Taariikh: 22/03/2023
DALLACSIIN SARKAAL **Bog 338**
XEER MADAXWEYNE LR. 103 Taariikh: 22/03/2023
MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE XASALINTA IYO ILAALINTA ARRIMAHA BULASHADA **Bog 339**
XEER MADAXWEYNE LR. 104 Taariikh: 22/03/2023
MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE ARRIMAHA SOMALINAD **Bog 340**
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 119 Taariikh: 30/03/2023
XEERKA MAARAYNTA DHIBAATOOYINKA GAADIIDKA BAJAAJTA **Bog 341**
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 120 Taariikh: 30/03/2023
XEER-NIDAAMIYAHA MAARAYNTA DAREER-HOOSAADKA BATROOLKA **Bog 343**
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 121 Taariikh: 30/03/2023
XEERKA XEER-NIDAAMIYAHA HAY'ADDA BATROOLKA SOOMAALIYEED **Bog 359**
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 122 Taariikh: 30/03/2023
XEERKA MAGACAABISTA XUBIN HAY'ADDA BATROOLKA SOOMAALIYEED **Bog 378**

XEER MADAXWEYNE LR. 126 Taariikh: 19/06/2023
MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA LUGTA/DHULKA EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA Bog 420
XEER MADAXWEYNE LR. 127 Taariikh: 19/06/2023
MAGACAABIS TALIYHA CUSUB EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA & XIL KA QAADIS TALIYIHII HORE EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA Bog 421
XEER MADAXWEYNE LR. 128 Taariikh: 05/07/2023
WAREEJIN IYO KU QAAADASHO DARAJO Bog 422
XEER MADAXWEYNE LR. 129 Taariikh: 19/06/2023
DALLANSIIN SARKAAL Bog 423
XEER MADAXWEYNE LR. 130 Taariikh: 19/07/2023
DIB U MAGACAABIS GUDOOMIYAHA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA Bog 424
XEER MADAXWEYNE LR. 131 Taariikh: 16/07/2023
MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SOCDAALKA & JINSIYADAHA SOMALIA Bog 425
XEER MADAXWEYNE LR. 132 Taariikh: 18/07/2023
MAGACAABIS KU-SIMAHA TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BADDA IYO ILAALADA XEEBAHA & XIL KA QAADISTA TALIYIHII HORE EE CIIDANKA BADDA IYO ILAALADA XEEBAHA Bog 427
XEER MADAXWEYNE LR. 133 Taariikh: 22/07/2023
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA QURBO-JOOGTA YURUB Bog 428
XEER MADAXWEYNE LR. 134 Taariikh: 23/07/2023
WAREEJIN SARKAAL Bog 429
XEER MADAXWEYNE LR. 135 Taariikh: 01/08/2023
MAGACAABIS TALIYE KU-XIGEENKA CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYA Bog 430
XEER MADAXWEYNE LR. 136 Taariikh: 15/08/2023
MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA J.F.S Bog 431
XEER MADAXWEYNE LR. 137 Taariikh: 20/03/2023
DALLANSIIN SARKAAL Bog 432
XEER MADAXWEYNE LR. 138 Taariikh: 18/09/2023
XIL KA-QAADIS TALIYE KU-XIGEENKII HORE EE CXDS IYO MAGACAABIS TALIYE KU-XIGEENKA CUSUB EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA Bog 433
XEER MADAXWEYNE LR. 139 Taariikh: 18/09/2023
XIL KA-QAADIS TALIYIHII CIIDANKA LUGTA/ DHULKA HORE ee CXDS & MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB ee CIIDANKA LUGTA/DHULKA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA Bog 434
XEER MADAXWEYNE LR. 140 Taariikh: 05/10/2023
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE ARRIMAHA DIB-U-HESHIISIINTA & DASTUURKA Bog 435
XEER MADAXWEYNE LR. 141 Taariikh: 24/09/2023
MAGACAABIS GOLAHA MAAMULKA SARE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA Bog 436
XEER MADAXWEYNE LR. 142 Taariikh: 08/10/2023
DHISMAHA LAANTA LA-SOCODKA HUBKA IYO RASAASTA Bog 437
XEER MADAXWEYNE LR. 143 Taariikh: 08/10/2023
MAGACAAIS LA-TALIYE SARE EE SIYAASADDA AHNA ISKU-DUWAHA XAFIISKA BARJAAMIJKA SIYAASADDA MADAXWAYNAHA J.F.S Bog 449

TUSMO

SHARCI LR. 14	Taariikh: 10/09/2023
SHARCIGA XAFIISKA HANTI-DHOWRKA GUUD EE J.FS	Bog 379
XEER MADAXWEYNE LR. 108	Taariikh: 20/04/2023
CAFIS MADAXWAYNE	Bog 396
XEER MADAXWEYNE LR. 105	Taariikh: 09/04/2023
WAREEJIN SARKAAL	Bog 400
XEER MADAXWEYNE LR. 106	Taariikh: 09/04/2023
MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYA	Bog 401
XEER MADAXWEYNE LR. 107	Taariikh: 17/04/2023
MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE CARRUURTA & XAQUUQDA SOO GALOOTIGA	Bog 403
XEER MADAXWEYNE LR. 109	Taariikh: 19/04/2023
WAREEJIN XEER-ILAALIYAAL	Bog 404
XEER MADAXWEYNE LR. 110	Taariikh: 23/04/2023
CAFIS MADAXWAYNE	Bog 406
XEER MADAXWEYNE LR. 111	Taariikh: 23/04/2023
MAGACAABIS NOOTAAYO	Bog 408
XEER MADAXWEYNE LR. 112	Taariikh: 29/04/2023
OGGOLAANSHO SHAQO-SII-WADID GUDOOMIYAHA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA	Bog 408
XEER MADAXWEYNE LR. 113	Taariikh: 30/04/2023
MAGACAABIS XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA	Bog 409
XEER MADAXWEYNE LR. 115	Taariikh: 14/05/2023
MAGACAABIS TALIYAHA MADAXWAYNAHA EE XAKAMAYNTA QULQULKA HUBKA SHARCI DARRADA AH	Bog 410
XEER MADAXWEYNE LR. 116	Taariikh: 11/06/2023
DALLACSIIN SARKAAL	Bog 412
XEER MADAXWEYNE LR. 118	Taariikh: 25/05/2023
DALLANSIIN L/SARAAKIIL	Bog 411
XEER MADAXWEYNE LR. 119	Taariikh: 25/05/2023
DALLANSIIN SARKAAL	Bog 38
XEER MADAXWEYNE LR. 120A	Taariikh: 01/06/2023
SOO WAREEJIN SARKAAL	Bog 413
XEER MADAXWEYNE LR. 120B	Taariikh: 01/06/2023
DALLACSIIN SARAAKIIL	Bog 414
XEER MADAXWEYNE LR. 123	Taariikh: 17/06/2023
MAGAACBID GUDOOMIYAHA IYO GUDOOMIYE KU-XIGEENADA HAY'ADDA QAXOOTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA EE DIB-U-EEGISTA & HIRGALINTA DASTUURKA	Bog 415
XEER MADAXWEYNE LR. 124	Taariikh: 17/06/2023
MAGACAABID MAAREEYAHA GUUD IYO XU-XIGEENADA MAAREEYAHA GUUD EE HAY'ADDA AQOONSIGA IYO DIIWAANGALINTA DADWAYNAHA	Bog 417
XEER MADAXWEYNE LR. 125	Taariikh: 19/06/2023
MAGACAABIS MADAXA XARUNTA DHAQAN-CELINTA SOOMAALIYA	Bog 419

XEER MADAXWEYNE LR. 126 Taariikh: 19/06/2023
MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA LUGTA/DHULKA EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA Bog 420
XEER MADAXWEYNE LR. 127 Taariikh: 19/06/2023
MAGACAABIS TALIYHA CUSUB EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA & XIL KA QAADIS TALIYIHII HORE EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA Bog 421
XEER MADAXWEYNE LR. 128 Taariikh: 05/07/2023
WAREEJIN IYO KU QAAADASHO DARAJO Bog 422
XEER MADAXWEYNE LR. 129 Taariikh: 19/06/2023
DALLANSIIN SARKAAL Bog 423
XEER MADAXWEYNE LR. 130 Taariikh: 19/07/2023
DIB U MAGACAABIS GUDOOMIYAHA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA Bog 424
XEER MADAXWEYNE LR. 131 Taariikh: 16/07/2023
MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SOCDAALKA & JINSIYADAHA SOMALIA Bog 425
XEER MADAXWEYNE LR. 132 Taariikh: 18/07/2023
MAGACAABIS KU-SIMAHA TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BADDA IYO ILAALADA XEEBAHA & XIL KA QAADISTA TALIYIHII HORE EE CIIDANKA BADDA IYO ILAALADA XEEBAHA Bog 427
XEER MADAXWEYNE LR. 133 Taariikh: 22/07/2023
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA QURBO-JOOGTA YURUB Bog 428
XEER MADAXWEYNE LR. 134 Taariikh: 23/07/2023
WAREEJIN SARKAAL Bog 429
XEER MADAXWEYNE LR. 135 Taariikh: 01/08/2023
MAGACAABIS TALIYE KU-XIGEENKA CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYA Bog 430
XEER MADAXWEYNE LR. 136 Taariikh: 15/08/2023
MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA J.F.S Bog 431
XEER MADAXWEYNE LR. 137 Taariikh: 20/03/2023
DALLANSIIN SARKAAL Bog 432
XEER MADAXWEYNE LR. 138 Taariikh: 18/09/2023
XIL KA-QAADIS TALIYE KU-XIGEENKII HORE EE CXDS IYO MAGACAABIS TALIYE KU-XIGEENKA CUSUB EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA Bog 433
XEER MADAXWEYNE LR. 139 Taariikh: 18/09/2023
XIL KA-QAADIS TALIYIHII CIIDANKA LUGTA/ DHULKA HORE ee CXDS & MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB ee CIIDANKA LUGTA/DHULKA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA Bog 434
XEER MADAXWEYNE LR. 140 Taariikh: 05/10/2023
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE ARRIMAHA DIB-U-HESHIISIINTA & DASTUURKA Bog 435
XEER MADAXWEYNE LR. 141 Taariikh: 24/09/2023
MAGACAABIS GOLAHA MAAMULKA SARE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA Bog 436
XEER MADAXWEYNE LR. 142 Taariikh: 08/10/2023
DHISMAHA LAANTA LA-SOCODKA HUBKA IYO RASAASTA Bog 437
XEER MADAXWEYNE LR. 143 Taariikh: 08/10/2023
MAGACAAIS LA-TALIYE SARE EE SIYAASADDA AHNA ISKU-DUWAHA XAFIISKA BARJAAMIJKA SIYAASADDA MADAXWAYNAHA J.F.S Bog 449

XEER MADAXWEYNE LR. 144 Taariikh: 15/10/2023
XIL KA QAADISTA GUDOOMIYHI (REKTARKII) HORE EE JAAMACADA UMADDA SOOMAALIYA & MAGACAABIS SII-HAYAHA (REKTERKA) GUDOOMIYAHA CUSUB EE JAAMACADA UMADDA SOOMAALIYEED Bog 442
XEER MADAXWEYNE LR. 145 Taariikh: 15/10/2023
WAREEJIN SARKAAL Bog 443
XEER MADAXWEYNE LR. 146 Taariikh: 16/10/2023
OGOLAANSHO FULIN XUKUN QISAAS AH Bog 445
XEER MADAXWEYNE LR. 147 Taariikh: 28/01/2023
MAGACAABIS XUBNO KAMID NOQONAYA XUBNAHA MAAMULKA BANKIGA DHEXE (NON-EXECUTIVE DIRECTORS) Bog 447
XEER MADAXWEYNE LR. 148 Taariikh: 18/01/2023
DALLACSIIN SARKAAL Bog 448
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 123 Taariikh: 06/04/2023
XEERKA XAKAMAYNTA HUBKA CAASIMADDA Bog 450
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 124 Taariikh: 06/04/2023
SIYAASADDA QARAN EE QURBA-JOOGTA SOOMAALIYEED Bog 451
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 126 Taariikh: 27/04/2023
XEERKA KU BIIRISTA AAGA GANACSIGA XORTA A H EE DALALKA CARBEED Bog 480
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 127 Taariikh: 11/05/2023
QARAARKA ADKAYNTA HUFTAANTA MAAMULKA IYO MAARAYNTA MAALIYADDA DALKA Bog 481
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 128 Taariikh: 11/05/2023
XEERKA SIYAASADDA HAWGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA DAWLADDA Bog 485
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 129 Taariikh: 19/06/2023
XEER NIDAAMIYAHA TARIIFADA KORONTADA Bog 504
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 130 Taariikh: 19/06/2023
XEER NIDAAMIYAHA RUKHSADDA KORONTADA Bog 516
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 131 Taariikh: 19/06/2023
XEERKA DHISMAHA XARUNTA TUBSAN Bog 528
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 132 Taariikh: 11/05/2023
QARAARKA ARRIMAHA LA XIRIIRA SHAQO QORISTA, ISKU BEDDELKA IYO DIB U HABEYNTA SHAQAALAHA RAYIDKA IYO KUWA KU-MEELGAARKA AH EE DAWLADDA Bog 532
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 133 Taariikh: 07/07/2023
XEER NIDAAMIYAHA HAGAHA IIBKA DEG DEGA AH Bog 535
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 137 Taariikh: 17/08/2023
XEER NIDAAMIYAHA MAARAYNTA HANTIDA DANTA GUUD IYO AGABKA DAWLADDA Bog 571
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 138 Taariikh: 24/08/2023
QARAARKA XOOJINTA U-HOGAANSANAANTA SHARCIYADA IYO XEERARKA DAKHLIGA Bog 590
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 174 Taariikh: 24/08/2023
MAGACAABIDDA MAAMULKA SARE IYO XUBNAHA HAY'ADDA KORONTADA QARANKA Bog 592

XEER RA’ISUL WASAARE LR. 140 Taariikh: 12/10/2023
XEERKA: SIYAASADDA DHAQANKA EE SOOMAALIYA Bog 594
XEER RA’ISUL WASAARE LR. 142 Taariikh28/10/2023
XEER-NIDAAMIYAHA DHOOFKA, SHAHAADOOYINKA IYO ASTAAMAHA TAYADA Bog 606
XEER RA’ISUL WASAARE LR. 143 Taariikh: 28/10/2023
XEER-NIDAAMIYAHA BAARITAANKA IYO XAQIIJINTA TAYO-DHAWRKA BADEECADAHA Bog 618
XEER RA’ISUL WASAARE LR. 144 Taariikh: 28/10/2023
XEER-NIDAAMIYAHA HAY’ADDA SIRDOONKA IYO NABADSUGIDDA QARANKA Bog 629

SHARCI LR.002
ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA KORONTADA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/763/B11/23**, ku taariikheysan **23/02/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Korontada**.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Ansixinta Hindise Sharciyeedka Korontada.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Muqdisho, 08 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-026-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA

HINDISE SHARCIYEEDKA KORONTADA

CUTUBKA 1aad: QODOBBO GUUD
QODOBKA 1aad: MAGACA SHARCIGA

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa **Sharciga Korontada.**

QODOBKA 2aad: ERAY-BIXIN

Erayadda soo socda haddii si ka duwan aanu sharcigu u qeexin, waxa loola jeedaa macnaha ku hor qoran:

1) **Adeeg-bixiye:** Waxaa loola jeedaa shirkad bixisa adeegga koronto, haysata ama laga dhaafay Rukhsadda ku aaddan adeegga ay bixinayso si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Rukhsadaha Korontada.
2) **Adeeg Koronto:** Waxaa loola jeedaa dhalinta, gudbinta iyo qeybinta korontada.
3) **Tamarta La-cusboonaysiiyo:** Waxaa loola jeedaa tamarta laga dhaliyo kheyraadka dabiiciga ah ee aan dhamaadka laheyn sida qoraxda, dabeysha, biyaha, haraaga qashinka ***aan sumeysneyn***, kuleylka dhulka hoostiisa, iyo hirarka ama mowjadaha badda.
4) **Tariifo:** waxaa loola jeedaa qiimo go'an oo loo gooyay isticmaalka korontada oo ay ku jirto wixii shuruudo ah ee la xiriira adeegyada korontada.
5) **Tamar Koronto:** Waxaa loola jeedaa ilo koronto laga dhalin karo sida Qorraxda, Dabayl, Noole, shidaal taas oo la gudbiyo, lana qeybiyo.
6) **Sharci:** Waxaa loola jeedaa Sharciga Korontada.
7) **Rukhsad Guud:** Waxaa loola jeedaa ogolaanshaha guud ee bixinta adeegga korontada ee isugu dhafan adeegyada dhalinta, qaybinta iyo gudbinta korontada.
8) **Rukhsadda:** Waxaa loola jeedaa shatiyada ay bixiso Hay'adda Korontada Qaranku, ee ogolaanayana bixinta adeegyada korontada si waafaqsan Sharcigan.
9) **Rukhsadle:** Waxaa loola jeedaa shirkad walba oo leh rukhsad ay bixisay Hay'adda Korontada Qaranka.
10) **Dhalinta:** Waxaa loola jeedaa koronto dhalinta laga sameeyo noocayda kala duwna ee tamarta, kuwa la cusboonaysiin karo iyo kuwa aan la cusboonaysiin karin.
11) **Ha'ayad:** Hay'adda Korontada Qaranka
12) **Hay'adda korontada:** Waxaa loola jeedaa Hay'adda Korontada Qaranka.
13) **Sharciyada iyo xeer-nidaamyeyaasha Dhaqangalka ah:** Waxa loola jeedaa sharciyada, xeerarka iyo xeer-nidaamyeyaasha xukuma qaababka bixinta shatiyada kala duwan ee ay Hay'adda Korotada Qaranku dhaqangaliso.
14) **Golaha Maamulka:** waxaa loola jeedaa Golaha Maamulka (Board of Directors) Hay'adda Horontada Qaranka.
15) **Shirkad Qaran:** waxa loola jeedaa shirkadda ka masuulka ah dhismaha, shaqo gelinta iyo gacan-ku-haynta mareegta qaran.
16) **Shakhsi:** Waxaa loola jeedaa shakhsi dabiici ah ama mid qaanuuneed.
17) **Maareeyaha Guud:** waxaa loola jeeda Maareeyaha Guud ee Hay'adda Korontada.
18) **Macaamiisha:** Waxaa loola jeedaa dadka ay shirkadaha korontadu gaarsiiyaan adeegga korontada

19) **Qaybin**: Waxaa loola jeedaa adeegga korontada oo la gaarsiiyo macaamiisha isticmaasha ee ka yar 66kv.
20) **Hannaanka Gudbinta**: Waxaa loola jeedaa shabakadda gudbinta ee ay qabyta ka tahay, qalabka isku-xira, fiilooyin dhulka hoostiisa ama dushiisa la mariyo, ama agabka kale ee suurto galiya gudbinta iyo/ama qaybinta tamarta korontada.
21) **Koronto Helidda**: Waxaa loola jeedaa koronto helid ay u siman yihiin dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada iyo gobollada dhalka oo dhan.
22) **Wasiir**: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda ka masúulka ah korontada ama tamarta
23) **Wasaaradda**: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha.
24) **Mareeg Qaran**: Waxa loola jeedaa mareegta ugu weyn ee isku xiraysa deegaanno kala duwan, goobo koronto dhalin iyo mareego yaryar.
25) **Wada-tashiga Bulshada**: Waxaa loola jeedaa qaab wada-tashi oo ku saleysan hab-muuqda oo Hay'adda korontada ama wasaaraddu kula tashanayso daneeyayaasha dhinaca korantada.

QODOBKA 3aad: UJEEDDADA SHARCIGA

1) Ujeeddooyinka guud ee sharcigan waa:
   a. Horumarinta iyo taabbagalinta Siyaasadda Qaran ee Tamarta.
   b. Abuurista hannaan sharci iyo mid maamul oo haga dhammaan qaybaha adeegga koronto ee dalka.
   c. Dhisidda Hay'adda Korontada Qaranka.
   d. Dhisidda Shirkadda Korontada Qaranka
2) Ujeeddooyinka gaarka ah ee sharcigan waa:
   a. Maaraynta suuqa korontada ee ku salaysan tartan furan oo xor ah.
   b. Sahlidda midaynta shabakadaha aan isku xirnayn ee gudbinta iyo qeybinta korontada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   c. Ilaalinta xuquuqda macaamiisha iyo adeeg-bixiyeyaasha.
   d. Dejinta hannaanka bixinta Rukhsadaha.
   e. Fududeynta iyo dhiirigelinta maalgashiga adeegyada korontada iyada oo la dhawrayo maalgashiyada tamarta ee dalka laga leeyahay.
   f. Dhiirrigelinta wadashaqaynta iyo isfahanka shirkadaha korontada si waafaqsan shuruucda dalka iyo siyaasadda Wasaaradda.
   g. Samaynta halbeegyada looga baahanyahay qalabka korontada iyo habraacyada loo marayo dab-dhalinta, gudbinta iyo qaybinta korontada.
   h. Fududaynta iyo dhiirigelinta horumarinta ilaha tamarta is-cusboonaysiisa, sida; dabaysha, kulka, qorraxda, iwm.

QODOBKA 4aad: BAAXADDA SHARCIGA

1) Sharcigani ***waxaa lagu*** maamulayaa dalka guud ahaan, oo ku xaddidan soohdimaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2) Sharcigan waxa uu xaqiijinayaa horumarinta bixinta adeegyada korontada iyada oo loo eegayo baahiyaha dhaqan-dhaqaale ee Soomaaliya.
3) Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa suuqa korontada dalka waxaana lagu illaalinayaa xuquuqda shirkadaha korontada, macaamiisha iyo maalgashatada korontada.

CUTUBKA 2aad: AWOODDA IYO WAAJIBAADKA WASAARADDA

QODOBKA 5aad: WAAJIBAADKA WASAARADDA

Waajibaadka Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyuhu waa:

1) Dejinta siyaasadda guud iyo qorshaha Korontada dalka iyada oo la tashanaysa dhinacyada ay khusayso una maraysa qaab daah furan.
2) Dhisidda iyo kormeerka Hay'adda Korontada Qaranka, iyo soo jeedinta magacyada xubnaha Golaha Maamulka Hay'adda ayada oo usoo gudbineysa Golaha Wasiiradda.
3) Horumarinta istaraatijiyadda siyaasadeed ee lagu fidinayo baaxadda adeegga korontada si loogu dhiirri-geliyo horumarinta dhaqan-dhaqaale ee Dalka.
4) Ilaalinta habsami-u-socodka adeegga Korontada iyo guud ahaan suuqa tamarta iyo dhawridda xuquuqda macaamiisha.
5) U gudbinta Golaha Wasiirrada warbixin lix-biloodle ah, taas oo qeexeeysa qorshe horumarineedka korontada iyo dhammaan howlaha la xiriira tamarta dalka.
6) Ansixinta tariifadaha korontada iyo khidmadda la xiriirta hadba sida ay u soo faahfaahiso ha'ayaddu lana jaanqaadaysa sharciyada cashuuraha dalka.

QODOBKA 6aad: AWOODDA WASAARADDA

1) Wasaaraddu waxay leedahay awoodda maamul ee korontada qaranka oo ay soo galayso dejinta siyaasadaha, tabaha fulineed, dejinta xeer-nidaamiyeyaasha, diyaarinta habraacyada iyo dejinta halbeegyada muhiimka u ah adeegga korontada dhammaan dalka, si waafaqsan Sharcigan.
2) Wasaaradda waxay u wakiilan kartaa Hay'adda fulinta arrimaha soo socda:
    a. Gelidda heshiisyo wadashaqayn, tayayn ama ganacsi iyada oo raacaysa siyaasadda Wasaaradda, nidaamka maaliyadeed iyo habraacyada dastuuriga ah ee dalka.
    b. Talo-bixinta, diyaarinta xeer-hoosaadyada iyo habraacyada la xiriira arrimaha korontada iyada oo la tashanaysa dhinacyada ay khuseyso.
    c. Gelidda, maamulidda iyo dhaqan-gelinta heshiisyada caalamiga ah oo ay Soomaaliya qeyb ka tahay ee la xariira arrimaha Korontada.
    d. Wasaaraddu waa in muddo 30 maalmood gudahood ah ku daabacdaa dhammaan xogaha, ogaysiisyada rasmiga ah ee aan sirta ahayn ee laga soosaaray xil-gudashada iyo hawlaha Hay'adda Korontada iyo Shirkadaha si waafaqsan Sharcigan.

QODOBKA 7aad: MAS'UULIYADDA WASIIRKA

Wasiirka ama ciddii wakiil ka ah, isaga oo tixgelinaya Sharciga Korontada, waxa uu yeelanayaa mas'uuliyadda fulinta Qodobbada 4aad iyo 5aad ee Sharcigan.

QODOBKA 8aad: WADA-SHAQEYNTA WASAARADDA IYO HAY'ADDA

1) Hay'adda Korontadu waa in ay hawlaheeda ka tixraacdaa tilmaamaha lagu dejiyo siyaasadaha qaran, qorshayaasha iyo istraatijiyadaha Wasaaradda.
2) Wasaaraddu marka ay gudanayso mas'uuliyaddeeda waxay tixgelinaysaa shaqada Hay'adda Korontada iyo waajibaadkeeda si waafaqsan Sharcigan
3) Hay'addu waxa ay u gudbineeysaa Wasaaradda warbixin saddex-biloodle ah oo ku aaddan hawlaheeda iyo wax-qabadkeeda la xiriira korontada iyo tamarka qaranka.
4) Hay'adda waxa ay u soo gudbineysaa Wasiirka warbixin maaliyadeed iyo qorsho hawleed lix-biloodle ah.

QODOBKA 9aad: GO'AAN QAADASHADA WASAARADDA

1) Wasaaraddu waxay hubinaysaa in dhammaan go'aannadeeda ay ku salaysan yihiin habraac daah-furan.

2) Wasaaraddu waxay la tashan doontaa daneeyeyaasha suuqa korontada, iyada oo xil iska saari doonta wax ka qabashada cabashooyinka oo lagu salayn doono danta guud si waafaqsan Sharcigan.
3) Arrin kasta oo hor yaalla, Wasaaradda waxa ay ka soo saari kartaa jawaab qoraal ah, taas oo lagu sharraxayo sababaha tallaabadaas ay u qaadday iyo in ay ku salaysanyihiin xaqiiqda xogaha ku aaddan ee hor yaalla.
4) Wasaaradda way diidi kartaa tallaabo kasta ama codsi kasta oo aan waafaqsanayn Sharcigan iyada oo si cad u sababaynaysa.

QODOBKA 10aad: MAAREYNTA IYO ILAALINTA XOGAHA SUUQA KORONTADA

1) Hay'adda Korontada Qaranku waxa ay xaq u leedahay in ay ka hesho Rukhsadlaha, macluumaadka ay u aragto in ay lagama-maarmaan u yihiin gudashada waajibaadkiisa, kuwaas oo aan waxna u dhimeyn xuquuqda gaarka ah si waafaqsan Sharcigan.
2) Wasaaradda iyo Hay'addu waxa ay ilaalinayaan siraha ganacsi iyo xogaha kale ee qarsoodiga ah ee ay ka soo ururiyaan Shirkadaha si waafaqsan Sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka:
    a) Haddii aan macluumaad bixintaas sharcigu xeerinayan,
    b) Waxaa kale oo ay ku xirantahay in dhinaca helaya xogtaas uu ku qasbanyahay si sharci ah in uu ilaaliyo xogta iyo macluumaadka lala wadaagay ee sirta.
3) Wasaaradda iyo Hay'addu waa in ay abuuraan farsamo;
    a) Lagu ururiyo, habeeyo, laguna falanqeeyo xogaha tamarta;
    b) Lagu maamulo xogta iyo macluumaadka tamarta;
    c) Dadweynaha looga faa'iideeyo, qaab qeexan, istaatistikada iyo xogta tamarta;
    d) Taas oo marwalba dhawraysa sirnimada macluumaadkaas, iyada oo aanay ku jirin xogaha horay loo baahiyay, haddii aan si sharci ah loo fasixin.
4) Wasaaradda, Hay'ádda iyo shaqaalahooduba kuma xadgudbi karaan xogta iyo macluumaadka mudnaanta leh ee ay si sir ah ugu soo gudbiyeen adeeg-bixiyayaasha iyo macaamiishu.

CUTUBKA 3aad: HAY'ADDA KORONTADA QARANKA

QODOBKA 11aad: ASAASIDDA HAY'ADDA

1) Si waafaqsan Qodobka 5(2)(3) ee Sharcigan, waxaa Sharcigan lagu dhisayaa Hay'adda Korontada Qaranka oo mas'uul ka noqonaysa maamulka iyo nidaaminta Korontada dalka.
2) Hay'adda waxaa lagu dhisayaa muddo boqol iyo labaatan (120) maalmood gudahood dhaqangalka Sharcigan, kaddib marka uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaraddu.

QODOBKA 12aad: XARUNTA HAY'ADDA

Xarunta ***dhexe ee*** Hay'addu waa magaala madaxda Soomaaliya, waxayna xafiisyo ku yeelaneysaa Dawlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

QODOBKA 13aad: MADAX-BANNAANIDA HAY'ADDA

1) Hay'adda Korontada Qaranku waa Hay'ad madax-bannaan marka ay gudaneyso waajibaadkeeda si waafaqsan Sharcigan,

2) Hay'addu waxa ay leedahay shakhsiyad qaanuuneed, waxyayna awood u yeelanaysaa in ay wax ku dacwayso ama lagu dacweeyo magaceeda, iyada oo laraacayo qaabka loo difaaco ama loo dacweeyo hay'adaha dawladda.
3) Hay'addu si joogto ah waa in ay ugu shaqaysaa siyaasadaha, istaraatijiyadaha iyo qorshayaasha Wasiirku go'aamiyo.
4) Hay'adda waxa ay soo saareysaa xeer-nidaamiyeyaal iyo habraacyo lagu nidaaminayo shirkadaha bixiya adeegga korontada iyo suuqa korontada dalka iyada oo latashaneysa Wasaaradda.

QODOBKA 14aad: MAS'UULIYADDA IYO WAAJIBAADKA HAY'ADDA

1) Dhaqangalinta Sharcigan iyo qorshayaasha ay meelmarisay Wasaaradda.
2) Soo jeedinta miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedka Hay'adda.
3) Qaadashada shaqaale xirfad leh oo haqabtiri kara baahiyaha Hay'adda.
4) U gudbinta Wasaaradda warbixin la xiriirta xaalka korontada markii laga codsado ama ay Hay'addu u aragto lagama-maarmaan.
5) Soo-saaridda habraacyo iyo go'aanno lagama-maarmaan u ah fulinta xilka Hay'adda si waafaqsan Sharcigan.
6) Soo-saarista xeer-nidaamiyeyaal, ay qayb ka tahay qiimaynta tariifooyinka iyo khidmadaha kale, hagidda hannaanka gudbinta iyo adeegyada kale ee korontada iyada oo latashanaysa shirkadaha korontada.
7) Qabashada dalabyada Rukhsadaha, bixinta Rukhsadaha iyo diyaarinta xeernidaaminta Rukhsadaha lagu dhaqayo.
8) Korjoogtaynta iyo nidaaminta adeeg-bixiyayaasha koronto, iyo jaangoynta ganaaxyada ka dhalanaya jabinta qodobbada Sharcigani jidaynayo.
9) Xallinta khilaafaadka shirkadaha iyaga oo dhexdhexaadintooda u saaraya guddiyo farsamo.
10) Go'aaminta ganaaxyada iyo magdhawyada ka dhasha jabinta Sharcigan si waafaqsan xeer-nidaamiye gaar ah oo lagu soo saari doono.
11) Dhinac kasta oo ku wax-yeellooba go'aan ay soo saartay Ha'ayaddu wuxuu xaq u leeyahay in uu cabasho u gudbisto maxkamadda awoodda u leh.

QODOBKA 15aad: QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA

Qaab dhismeedka Hay'adda Korontada Qaranku wuxuu noqonayaa sida soo socota:-

1) Golaha Maamulka Hay'adda.
2) Maareeye guud.
3) Maareeye Ku-xigeen.
4) Hay'addu waxay yeelaneysaa waaxyo kala duwan oo mid walba hawlgaar ah u xilsaaran tahay.

Qodobka 16aad: Maamulka Hay'adda Korontada

1) Golaha Maamulka Hay'adda wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) Xubnood oo ka kala imaanaya:-
    a) 4 (afar) xubin oo ay magacaabayso Wasaaradda Tamarta & Biyaha oo midkood yahay sharciyaqaan;
    b) 3 (saddex) xubin oo xirfadlayaal ah, kana imaanaya suuqa koronta Dalka;
    c) 2 (laba) xubin oo ka imanaya Ururada Bulshada Rayidka ah.

2) Golaha Maamulka Ha'ayaddu go'aanada waxaa ay ku gaarayaanan aqlabiyadda tirada uu kulankooda ku guntamayo oo ah ugu yaraan (5) xubnood.
3) Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa waa fuliyayaasha go'aannada kasoo baxa Golaha Maamulka ee Hay'adda.
4) Dhammaan qodobbada ku xusan awoodaha, waajibaadka iyo mas'uuliyadaha Hay'adda waxaa go'aanka ugu danbeeya iska leh Golaha Maamulka.
5) Xubnaha Golaha Maamulku waa in ay;
    a) Marwalba u dhaqmaan si hufnaan leh markasta oo ay gudanayaan waajibaadkooda;
    b) Marwalba u sheqeeyaan danaha Hay'adda oo ayna u shaqayn dantooda gaarka ah;
    c) Ka madaxbannaanaadaan saamayn aan habboonayn iyo jihayn bannaanka kaga timaadda;
    d) Ka sarriigtaan in ay u codeeyaan ama ra'yi ku darsadaan arrin horyaalla Hay'adda oo ay dan gaar ah ku qabaan;
    e) U dhaqmaan sida laga rabo, lagana filayo qof xil dadweyne haya;
    f) Una shaqeeyaan danta guud.

QODOBKA 17aad: MUDDADA XIL-HAYNTA HAY'ADDA

Maareeyaha, Ku-xigeenkiisa iyo xubnaha Golaha Maamulka Hay'adda waxay haynayaan xilka xubinnimada muddo shan (5) sano ah oo loo cusboonaysiin karo hal mar oo kaliya.

QODOBKA 18aad: SHURUUDAHA XUBINNIMADA MAAMULKA HAY'ADDA

Qof kasta oo xubin ka noqonaya Golaha Maamulka waxaa laga doonayaa shuruudo la mid ah kuwa lagu xiray madaxda sare ee Hay'adda sida lagu qeexay qodobka 21aad, waxayna xilkooda ku waayi karaan si la mid ah sida madaxda sare ee Hay'adda sida lagu qeexay qodobka 22aad.

QODOBKA 19aad: GUNNADA XUBNAHA MAAMULKA HAY'ADDA

Shaqadda Golaha Maamulka ee Hay'adda waa shaqo dhiman, markii laga reebo shaqada Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa oo shaqo buuxda ah, waxaana loo magacaabayaa dad shaqooyin kale haysta, waxayna yeelanayaan gunno-fadhi marka ay shirayaan, taas oo lagu xaddidi doono xeer-hoosaadka Hay'adda, waxaa kale oo ay xaq u yeelanayaan in laga bixiyo wixii kharash ah ee loo galo qabsoomidda shirarka.

QODOBKA 20aad: MAGACAABIDDA MAAMULKA HAY'ADDA

Xubnaha Hay'adda Korontada oo ay ka mid yihiin Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda, waxaana meel marinaya Golaha Wasiirrada.

QODOBKA 21aad: SHURUUDAHA MADAXDA HAY'ADDA

1) Mas'uul kasta oo kamid ah Madaxda Hay'addu waa inuu yahay Soomaali.
2) Da'diisuna aysan ka yarayn (30) sano.
3) Waa in uu dhimir ahaan fayowyahay, isla markaana gudan karo waajibaadka shaqo ee loo igmaday.
4) Waa in uusan ku dhicin xukun ka dhashay fal-dembiyeed ka reebaya in uu noqdo shaqaale Dowladeed, isla markaasna noqdaa qof leh asluub wanaag iyo dhawrsanaan.

5) Waxbarashada ka wato shahaado jaamacadeed, leeyahayna khibrad shan (5) sanno ah ugu yaraan.
6) Waa inuu leeyahay mid ama laba ka mid ah xirfadaha hoos ku qoran:
7) Aqoonta Sharciga, Daryeelka Macaamiisha, Maamulka iyo Maareynta, Tamarta, teknologiyada, Ingineernimada guud, midda korontada ama midda makaanigga.

QODOBKA 22aad: SABABAHA LAGU WAAYI KARO XILKA

1) Madaxda sare, xubnaha Hayádda iyo dhammaan shaqaalaha kale ee Hay'addu waxa ay xilka ku waayi karaan in looga qaado sida ay ku yimaadeen ama si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.
2) Waxaa ka dheeri ah arrinta ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan oo xilka lagu waayi karaa arrimaha soo socda;
    a) Geeri ku timaaddo;
    b) Is-casilaad Hay'addu aqbashay;
    c) Caafimaad-darro keeni karta gudasho la'aan xileed;
    d) Xil-gudasho la'aan ama musuq uu ku sameeyey hawshiisa;
    e) Ku-xad-gudubka Sharciga Korontada iyo shuruucda kale ee qabanaya.

QODOBKA 23aad. DANAHA ISKA HOR IMANAYA

1) Madaxda sare ee Hay'adda iyo shaqaalaha kaleba waxaa ka reebban in ay galaan hawlo liddi ku ah ama saamayn taban ku yéelanaya waajibaadkooda shaqo ee ku wajahan xilka Hay'adda.
2) Haddii sarkaal ka tirsan Hay'adda ay la soo gudboonaato arrin keeni karta isdhaaf dano, sarkaalkaas waxaa ku waajib ah inuu ka joogsado gudashada waajibaadkiisa la xirirra arrintaas.
3) Iska horimaadka danta waxaa ka mid ah danaha ganacsi, xiriirka qoyska, iyo ka tolnimo.
4) Danahaasi waxaa ka mid ah saamiyada shirkadaha uu ku leeyahay sarkaalku, qof isaga ku tiirsan, isagu uu ku tiirsanyahay, ama qof qaraabadiisa ah, amaba saamiyo uu wakiil ka yahay sarkaalkaas, qof isaga ku tiirsan, isagu uu ku tiirsanyahay, ama qaraabadiisa ah.
5) Haddii ay dhacdo ku lug lahaanshaho xaaladaha ku xusan farqadaha (3) iyo (4), sarkaalka Hay'adda waxaa ku waajib ah:
    a) In uu iska reebo ka-qaybgalka go'aan-qaadashada wixii ku saabsan arrintaas gacanta ay ku hayso Hay'addu.
    b) In uu wareejiyo mas'uuliyaddiisa rasmiga ah ee ku aaddan go'aan ka gaarista arrinkaas, isagoo sababaynaya.
6) Waa sharci darro in xubin ka mid ah Guddiga ama shaqaale ka ah Hay'adda in uu dano toos ah ku yeesho shirkad hoos timaadda xayndaabka shaqo ee Hay'adda.

QODOBKA 24aad: XUQUUQDA SHAQAALAHA HAY'ADDA

Shaqaalaha Hay'addu waxay Xuquuqda iyo waajibaadka kala mid noqonayaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda.

QODOBKA 25aad: MIISAANIYADDA HAY'ADDA

1) Hay'addu waxa ay si sannadle ah u diyaarinaysaa miisaaniyaddeeda, si ay Wasaaraddu ugu gudbiso Golaha Wasiirrada.
2) Dakhliga Hay'addu wuxuu ka iman karaa;

a) Qoondada tooska ee miisaaniyadda Dawladda
b) Dakhliga ka soo xarooda ganaaxyada la saaro shirkadaha ka hawlgala korontada si waafaqsan Sharcigan;
c) Khidmadda ay bixiyaan dhinacyada codsanaya Rukhsadaha iyo Rukhsadlayaasha;
d) Gunnooyinka khilaaf-xallinta;
e) Ilaha kale ee dakhli ee ay Hay'addu ku hesho si waafaqsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama.

3) Hay'addu waxa ay si madaxbannaan u diyaarinaysaa habraacyada maaliyadeed ee la xiriira shaqadeeda si waafaqsan Hannaanka Maamulka Maaliyadeed ee Dawladda.
4) Shaqaalaha Hay'adda, mushaaraadkooda iyo gunnooyinkooda ka sokow, waxa loo qoondayn karaa gunnooyin dhiirigelineed oo laga soo jaray dakhliga ay usoo xareeyaan Dawladda.

CUTUBKA 4aad: RUKHSADAHA

QODOBKA 26aad: RUKHSAD

1) Rukhsadaha waxaa bixinaya Hay'adda Korontada Qaranka si waafaqsan Sharcigan iyo siyaasadda guud ee Wasaaradda.
2) Rukhsadaha waxaa loo bixiyaa hawlaha Dab-dhalinta, Gudbinta ama Qeybinta.
3) Qofna kama shaaqeyn/gacansan karo tamarta korontada, ha ahaado dab-dhalin, dab-gudbin ama dab-qeybin koronto, dalka gudihiisa, isaga oo aan u haysan Rukhsad adeeg-bixin koronto, wixii intaa ka baxsan waxaa qeexi doono Xeer-nidaamiyaha Rukhsada.
4) Hay'addu waxa ay leedahay awoodda bixinta iyo diidmada Rukhsad koronto si waafaqsan shuruudaha Rukhsad-bixinta iyo xeer-nidaamiyeyaasha Hay'adda.
5) Rukhsadlayaasha waxaa waajib ku ah in ay u hogaansamaan qodobbada Sharcigan, shuruudaha Rukhsadda, iyo Xeer-nidaamyeyaasha.
6) Hay'addu waxay yeelaneysaa awoodda qiimeynta shirkadaha adeeg-bixiyeyaasha koronto ee u qalma Rukhsadaha.
7) Hay'addu marka ay go'aaminayso cidda u qalanta Rukhsadaha guud, waxay hubinaysaa in la maray dhammaan habraacyada iyo Xeer-nidaamiyeyaasha u degsan rukhsad-bixinta.

QODOBKA 27aad: RUKHSAD-BIXIN

1) Hay'addu waxay bixin kartaa Rukhsadda bixinta adeeg koronto oo muddo cayiman ku astaysan sida uu qabo Xeer-nidaamiyaha Rukhsadaha.
2) Habka Codsiga Rukhsadaha korontadu wuxuu noqonayaa mid qoraal ah, laguna socodsiinayo Hay'adda, iyada oo la raacayo qaabka ay Hay'addu u diyaarisay Rukhsad bixinta, laguna soo lifaaqayo macluumaadka loo baahanyahay iyo caddeyn muujinaysa in la bixiyey khidmaddii codsiga, si waafaqsan Sharcigan.
3) Hay'addu waa in ay ku siisaa codsadaha jawaab qoraal ah muddada xeerinidaamiyuhu dhigayo.
4) Hay'addu haddii ay go'aansato inaysan siin codsadaha Rukhsad, waxay muddada xeer-nidaamiyuhu qeexayo qaab qoraal ah ugu wargelinaysaa codsadaha, iyadoo u faahfaahinaysa sababaha go'aankeeda si waafaqsan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyaasha
5) Rukhsadda ay bixisey Hay'addu si waafaqsan Sharcigan, laguma wareejin karo, lagamana iibin karo qeyb ka mid ah ama dhammaan Rukhsadda adeegga Shakhsi ama shirkad kale iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin Hay'adda.
6) Rukhsadda guud ee adeegga korontada waxaa loo bixinayaa habka Rukhsad qaadashada guud, kaas oo ay ku jiraan Dhalinta, Gudbinta iyo Qeybinta korontada, waxaana qaadan

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

kara adeeg-bixiye buuxiyay habraaca qaadashada Rukhsadda guud, waxaana lagu qeexi doonaa xeer-nidaamiye u gaar ah.

7) Muddada Rukhsadda guud ee adeeg-bixiyaha koronto waxaa lagu nidaaminayaa xeer-nidaamiye u gaar ah, iyada oo lagala tashanayo Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha, isla markaana la tixgelinayo baaxadda adeeg bixiyeyaasha korontada.
8) Qiimaha Rukhsadda guud iyo wixii la xiriira sida Dab-dhalinta, Gudbinta ama Qeybinta waxaa xaddidaya Hay'adda kaddib marka ay kala tashato Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha, iyada oo la tixgelinayo duruufaha u gaarka ah dalka, waxaana lagu dhaqayaa xeer-nidaamiye ugaar ah.

QODOBKA 28aad: CUSBOONAYSIINTA RUKHSADDA

1) Hay'addu waxay cusbooneysiineysaa Rukhsadda marka uu Rukhsadlahu soo codsado, ka dib marka la hubiyo in wakhtigu ka dhammaaday, una hoggaansamay dhammaan shuruudihii hore ee lagu siiyay Rukhsadda sida ku cad Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha Hay'adda.
2) Rukhsadluhu waa inuu soo codsadaa cusbooneysiinta inta aysan ka dhicin Rukhsaddii hore.
3) Haddii Rukhsadluhu uu ka dib dhaco waqtigii loogu talagalay cusbooneysiinta, Rukhsadlaha waxaa loo tixgelinayaa duruufaha keeni kara dib u dhac sababeysan oo maangal ah, haddii la waayo duruuf cad oo sababeysan wuxuu mudan doonaa ganaax sida lagu caddeyn doono xeer-nidaamiyeyaasha Hay'adda ee qeexaya habraaca ganaaxyada.
4) Haddii ay dhacdo in Hay'addu cusbooneysiin weydo codsiga, Rukhsadlaha wuxuu wadan karaa hawlahiisa shaqo si waafqsan shuruudihii horay loogu siiyay illaa inta ay Hay'addu ka gaarayso go'aanka cusbooneysiinta.
5) Markasta oo ay Hay'addu qaadanayso go'aan diidmo cusbooneysiin, ama ay saarayso ganaax Rukhsadlaha jebiyey shuruudihii lagu siiyey Rukhsadda si waafaqsan Sharcigan, Hay'addu waxay go'aankeeda ku gudbinaysa hab qoraal ah.
6) Shirkadaha korontada wadaniga ah ee ka shaqeynayey dalka ka hor inta aan la dhagangelin Sharciga Korontada, Hay'addu waxay u tixgelineysaa jiritaanka sharciyaddooda, waxana la waafajin doonnaa Sharcigan.

QODOBKA 29aad: KA-TANAASULIDDA AMA DIB-U-SOO-CELINTA RUKHSADDA

Rukhsadlahu wuxuu u soo celin karaa Hay'adda Rukhsaddiisa asaga oo soo raacinaya qoraal ogeysiin ah waqti walba, si waafaqsan Sharcigan, waxayna soo-celinta Rukhsaddu hirgelaysaa marka Hay'addu hesho qoraalka rasmiga ah ee Rukhsadlaha.

QODOBKA 30aad: KALA-NOQOSHADA RUKHSADDA

Hay'addu waxa ay la noqon kartaa ama baabi'in kartaa Rukhsad ay bixisay marka ay dhacaan xaaladahan soo socda:

1) Haddii uu adeegsan waayo Rukhsadda, bixinna waayo adeegga lagu qeexay Rukhsadda waqti cayiman si waafaqsan Xeer-nidaamiyeyaasha.
2) Haddii Rukhsadluhu bixin waayo ganaaxa lagu saaray ku xad-gudubka Sharciga Korontada ee lagu siiyey Rukhsadda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

3) Marka uu fulin waayo ama u hogaansami waayo xeer-nidaamiyaha ay soo rogtay Hay'adda si waafaqsan Sharcigan.
4) Haddii uu Rukhsadluhu bixin waayo khidmadda ku waajibtay.
5) Haddii uu ku qanci waayo Rukhsadluhu go'aanka Hay'adda ee kala noqoshada Rukhsadda waxaa uu u dacwoon karaa maxkamadda awoodda u leh.

CUTUBKA 5aad: KORONTA GALINTA

QODOBKA 31aad: ISTARAATIIJIYADDA QARAN EE KORONTA GALINTA

1) Wasaaraddu iyada oo la tashanaysa Wasaaradaha Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, waxay diyaarinaysaa Qorshaha Qaran ee Koronto-Galinta iyo tabahiisa fulineed, iyada oo meel marintiisa kadib ku samayn doonta qiimayn iyo dib-u-eegis.
2) Wasaaradu waxay joogto u kormeeraysaa horumarka laga gaaray fulinta Qorshaha Koronto Galinta Qaran iyo tabahiisa fulineed, iyo sidoo kale:
    a) Horumarinta hannaanka koronto gudbinta, iyo mareegta qaran ee korontada.
    b) Horumarinta adeegyada koronto ee bannaanka ka ah mareegta qaran ee korontada oo ay ku jirto korontada laga dhaliyo ilaha is-cusboonaysiiya.
3) Wasaaraddu, iyada oo kaashanaysa wasaaradaha Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, waxay kor joogteyneysaa, uruurineysaana xogaha ku saabsan koronta galinta guud ee dalka.

QODOBKA 32aad: BAAHINTA HELIDDA KORONTADA

1) Adeeg-bixiyayaasha korantadu waa in ay ku dedaalaan gaarsiinta adeegga koronto magaalooyinka, tuulooyinka iyo miyiga dalka.
2) Wasaaraddu waa in ay ku dedaashaa fududeynta sidii adeegga koronto loo ballaarin lahaa si loo daboolo baahida dalka oo dhan.
3) Si gaar ah Wasaaraddu waxa ay masuul ka tahay koranto galinta miyiga, waana in ay ku dhiirrigeliso adeeg-bixiyayaasha koronto in ay deegannadaas adeeggooda gaarsiiyaan.
4) Goorta iyo goobta la awoodo, tignoolajiyad ahaan iyo dhaqaale ahaan, baahinta helitaanka korontada waxaa ka mid noqon doona horumarinta adeegyada koronto ee aan qaybta ka ahayn hannaanka gudbinta guud, shabakadaha kooban, nidaamyada cadceedda dabka ka dhaliya ee madaxabannaan, iwm.

QODOBKA 33aad: NIDAAMINTA KORONTO-GELINTA MIYIGA

1) Wasaaradda waxaa loo igmaday xaqiijinta helintaanka koronto loo simanyahay oo ku baahsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, taas oo lagu hirgelin doono soo saarista xeer u gaar ah oo fududeynaya ballaarinta helitaanka koronto jaban, iyada oo loo marayo abuurista jawi maalgashi oo hufan isla markaana tartan xor ah ku dhisan.
2) Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa xeerar lagu maamulayo dhinacyada farsamada iyo tayada koronto galinta miyiga, kuwaas oo ka qayb qaadan kara dhiirrigelinta maalgashiga koronto ee miyiga iyo hoos u dhigista kharashaadka la xidhiidha helitaanka korontada.
3) Wasaaraddu iyada oo raacaysa shuruudaha Rukhsadaha bixinta adeegga koronto, waxay u astayn kartaa waqtiyo ku filan oo dabacsan wixii ku saabsan u hoggaansanaanta halbeegyada iyo habraacyada ay dhigayaan qodobbada sare ku xusan.
4) Wasaaraddu waa in ay soo saartaa hab-raacyada, halbeegyada iyo xeer-nidaamiyaha ku habboon hirgelinta qodobbada kor ku xusan

CUTUBKA 6aad: TAMARTA IS-CUSBOONEYSIISA IYO DHAWRISTA KORONTADA

QODOBKA 34aad: TAMARTA IS-CUSBOONEYSIISA

1) Wasaaradda waxay kor u qaadaysaa horumarinta iyo isticmaalka teknoolijayada ilaha tamarta is-cusboonaysiisa oo ay ka mid yihiin qorraxda, dabaysha, biyo xireenada, hirarka iyo qashinka aan sumaysnayn
2) Wasaaraddu waxay dhiirigelineysaa isticmaalka tamarta is-cusboonaysiisa iyada oo u maraysa:
    a) Samaynta istaraatiijiyad qaran oo isku duwaysa cilmi-baarista tamarta is-cusboonaysiisa.
    b) Kobcinta kartida shaqaalaha, suuq-gaynta, dab-dhalinta iyo qaybinta shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa danta guud.
    c) Dhiirrigelinta isticmaalka haraaga qashinka aan sumaysnayn ee laga dhaliyo tamarta.
    d) Dhiirrigelinta horumarka ku habboon awoodda wax soo saarka, rakibaadda, dayactirka, iyo teknoolijiyadda tamarta is-cusboonaysiisa.
    e) Kor u qaadista xiriirka iyo iskaashiga hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeeya tamarta si loo gaaro awood buuxda oo looga faa'idaysan karo ilaha tamarta is-cusboonaysiisa ee dalka.
    f) Sameynta xarun lagu kaydiyo xogaha tamarta is-cusboonaysiisa.

QODOBKA 35aad: QORSHAHA BEEKHAAMINTA IYO TAYEYNTA TAMARTA

1) Wasaaradda waxay tayeyn iyo beekhaamin u samaynaysaa mashaariicda tamarta qaran.
2) Wasaaradda, waxay horumarinaysaa qorshaha beekhaaminta iyo tayaynta tamarta iyadoo xaqiijinaysa:
    a) In lagu muujiyo calaamadaha heerka tayo ee qalabka korontada iyo agabka kale ee la isticmaalayo.
    b) Qaadista tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah si loo abuuro wacyigelin loona faafiyo macluumaadka khuseeya tayaynta isticmaalka tamarta iyo beekhaaminteeda.
    c) Ku dhiirrigelinta macaamiisha, shirkadaha bixiya adeegga koronto iyo ha'ayadaha cilmi baarista ee beekhaaminta tamarta.
    d) Fulinta barnaamijyo iskaashi oo la xiriira tayaynta isticmaalka tamarta iyo beekhaaminteeda.
    e) Bixinta dhiirrigelin maaliyadeed marka shirkad koronto ay maalgelin ka sameyneyso miyiga.

CUTUBKA 7aad: MAALGASHIGA

QODOBKA 36aad: MAALGASHI SHISHEEYE

1) Waxii maalgashi shisheeye ah ee ku saabsan tamarta waxaa Xukuumadda wakiil uga ah Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha, iyada oo la raacayo sharciyada Maalgashi ee dalka
2) Si waafaqsan shuruucda maalgashiga dalka, Wasaaraddu waxay dhiirigelineysaa, dhawreysaana xuquuqda shirkadaha korontada waddaniga ah iyo guud ahaan maal-geshadayaasha.

3) Wasaaraddu, iyada oo la kaashanaysa wasaaradaha u xilsaaran Maaliyadda iyo arrimaha dhaqaalaha, raacaysana nidaamka lagu dejiyay Sharciga Maalgeshiga Shisheeye waxa ay mas'uul ka tahay abuuridda jawi ogolaan kara in shirkadaha shisheeye ay maalgashi ku sameeyaan Tamarta soomaaliya.
4) Wasaaraddu iyada oo ka duulaysa xaqiijinta hadafyada koronto gelinta qaran, waxa ay heshiisyo la geli kartaa dhinacyo shisheeye si waafaqsan Sharcigan iyo sharciyada kale ee khuseeya.
5) Shirkadaha maalgashiga shisheeye waxay wax ku darsan karaan oo kaliya shirkadaha adeegga korontada bixiya ee wadaniga ah, Wasaaradda ayaa hubineysa heshiisyada ay wada galayaan dhinacyada wax isku darsanayaa
6) Si loo helo maalgashi shisheeye Wasaaradda ayaa u xilsaaran dajinta xeer-nidaamiye lagu dhaqo kuna salaysan tartanka suuqa xorta ah oo soo jiita maalgashadayaasha iyada oo laraacayo shuruucda maalgashiga shisheeye.
7) Heshiis kasta oo maalgashi hadii uu jebiyo sharciyada maalgeshiga xukuma ama siyaasadaha Wasaaraddu dejisay waxaa laga soo qaadi karaa waxba-kama-jiraan.

QODOBKA 37aad: MAALGASHIGA MUWAADINKA

1) Sharciga korontadu wuxuu dhawrayaa, dhiirrigalinayaa, mudnaan gaar ahna siinayaa maalgashiga waddaniga ee dhinaca korantada si kor loogu qaado dhaqaalaha dalka.
2) Wasaaradda ayaa dejinaysa siyaasado iswaafajinaya maalgashiyada muwaadaniinta iyo maalgashiyada shisheeye iyada oo eegaysa danta guud iyo maslaxada muwaadinka.

QODOBKA 38aad: WAXA REEBBAN IN LA MAALGASHADO

1) Waxaa reebban qashinka warshadaha, Maadooyinka sunta ah, kuwa xanbaarsan shucaaca halista ah iyo qashin kasta oo dhalin kara waxyeelo bini'aadamnimo iyo mid deegaan.
2) Wax kasta oo saamayn kara caafimaadka bulshada iyo isku dheelli-tirnaanta deegaanka. (Biodiversity)
3) Waxaa reebban in Maalgashiga shisheeye uu ku lugyeesho habab tartan oo sharci darro ah, oo ujeeddadoodu yihiin in saamayn taban loo gaysto maalgashadaha wadaniga ah.
4) Waxaa reebban maalgashade shisheeye oo aan shuraako la ahayn Maalgashade waddani ah.
5) Maalgashade kasta oo aan u hogaansamin xeer-nidaaminta Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha iyo shuruucda kale ee kusheysa maalgashiga shisheeye, heshiiskiisa maalgashi waa waxba-kama-jiraan.

QODOBKA 39aad: DEEQAHA IYO WADAAGGA MAALGASHIGA GAARKA AH IYO KAN GUUD

1) Deeqaha waxaa loola jeedaa waxii taakulo farsamo iyo dhaqaale ah oo ku aaddan tamarta ee deeqbixiye ugu deeqo Soomaaliya.
2) Wax kasta oo deeq ah kuna aaddan tamarta ee dalka loogu deeqo waxaa mas'uul ka ah Wasaaradda iyadaana maamulaysa una qoondaynaysa mashaariicda lagu taabba-galinayo iyo dhinacyada kala duwan ee looga faa'idaynayo si waafaqsan siyaasadaha qaranka, istaraatijiyadaha iyo qorshayaasha Dawladda, si loo gaaro koronta gelin qaran.
3) Wasaaraddu way kula shirkoobi kartaa deeqaha ay hesho shirkadaha si ganacsi wadaag ah iyada oo raaceysa nidaamka wax-iskudarsiga hantida gaarka iyo tan guud.

4) Wasaaradda deeqaha soo gaara waxay sida ugu haboon wax uga qoondaynaysaa Dowladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyada oo loo fiirinaayo baahiyaha iyo xaaladaha gaarka ah ee markaa taagan.
5) Sharcigan wuxuu ogolaanayaa wadaagga maalgashiga guud iyo midka gaarka ah ee ay shirkadaha gaarka ah kula shirkoobayaan Dawladda, ama dowladdu kula shirkoobeyso shirkadaha gaarka ah, waxaana dawladda wakiil uga noqonaya Shirkadda Korontada Qaranka.

CUTUBKA 8aad: WADA-TASHIGA SHIRKADAHA KORONTADA

QODOBKA 40aad: HABKA WADA-TASHIGA

1) Wasaaraddu waxa ay xilli ka xilli qabanaysaa wada-tashiyo guud oo ku saabsan arrimaha la xiriira siyaasadda iyo istaraatijiyadda Xukuumadda iyo dhaqangelinta Siyaasadda Qaran ee Tamarta. Wasaaraddu waxa ay u wakiilan kartaa wadatashiyadaas Hay'adda.
2) Hay'addu waa in ay qabato wadatashiyo joogto ah oo la xiriira arrimaha khuseeya korontada qaranka.
3) Wadatashiyada ay hagayso Wasaaradda ama Hay'adda waa in ay noqdaan kuwo u dhaca si daahfuran, ujeeddadooduna tahay sidii looga wadashaqeyn lahaa danta guud iyo dhisidda kalsooni dhexmarta Dawladda iyo shirkadaha ka shaqeeya korontada.
4) Hay'addu waxay ururinaysaa dhammaan fikradaha iyo talooyinka ka soo baxa wadatashiyada, waxayna ka soo saaraysaa nuqullo qoraal ah, waxaana lala wadaagi karaa shirkadaha. Ciddii si gaar ah u danaynaysana waxaa la siin karaa nuqul kamid ah talooyinkii ka soo baxay wada-tashiga, iyada oo laga qaadaayo lacag qiimaheeda ay u goyso Hay'addu, oo u dhiganta kharashkii ku baxay daabacaadda qoraalkaas, taas oo aan laga doonayn macaash ama faa'iido.

QODOBKA 41aad: SHURUUDAHA WADA-TASHIGA

1) Hay'addu waxay soo jeedin kartaa shir wadatashi iyada oo u diraysa ogeysiis shirkadaha. Ogaysiisku waa in uu habkan noqdo:
   a) Waa in la xuso waqtiga wadatashiga.
   b) Soo-bandhigidda sababta wadatashiga iyo macluumaadka looga baahan yahay in looga hadlo.
   c) Muddada ay furan tahay in la soo gudbiyo fikradaha oo ay la socdaan dhammaan wixii lifaaqyo ah ee la xiriira.
   d) Wixii qoraallo ah oo kaabaya ciddii daneyneysa inay soo dirto fikraddeeda.
   e) Wixii warbixin kale ah oo ay Hay'addu u aragto inay ku habboon tahay arrinta la rabo in laga hadlo.
   f) Hay'addu waxay hubinaysaa in ogeysiiska wadatashiga la gaarsiiyay shirkadaha waqti ku filan.
2) Talooyinka ka soo baxay wadatashiga lala yeeshay Shirkadaha, Hay'adda iyo Wasaaradduba waxa ay siinayaan tixgelin.

CUTUBKA 9AAD: TAYADA IYO XAQA MARINKA

QODOBKA 42aad: TAYADA QALABKA KORONTO EE LA SOO WAARIDO

1) Si waafaqsan habraacyada iyo xeer-nidaamiyayaasha xukuma tayada qalabka korantada, Hay'addu waa in ay korjoogtaysaa tayada qalabkaas, una fududaysaa soo dhoofinta qalabka soo-waaridayaasha, ganacsatada tafaariiqda iyo adeeg-bixiyayaasha korontо.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Iyada oo la fulanayo faqradda (1) ee qodobkan, Hay'addu waa in ay wadatashi guud la yeelataa soo-waaridayaasha, ganacsatada tafaariiqda, iyo adeegg-bixiyayaasha koronto si looga gaaro Isfahan habka maamul ee loo tijaabinayo qalabka kortono.
3) Hay'addu waxa ay diiwaangelin doontaa dhinacyada awoodda loo siiyay inay tijaabiyaan qalabka korontada.
4) Soo-waaridayaasha, ganacsatada tafaariiqda, iyo adeegg-bixiyayaasha koronto waxa ay soo jeedin karaan wax ka badalka, ka reebista iyo ku biirinta wixii la xiriira dhinacyada loo igmanayo baarista tayada agabka korontada.
5) Muwaadin kastaa wuu soo waaridi karaa qalab koonto, haddii uu u haysto ogolaansho, si waafaqsan xeerarka khuseeya, isagoo bixinaya khidmadaha ku waajibay oo kali ah.

QODOBKA 43aad: XAQA MARINKA ADEEG-BIXIYAHA

1) Rukhsadlaha bixiya adeegga Koronto wuxuu xaq u leeyahay in si waafaqsan Sharciga loogu oggolaado dhex-maris uu dhex-marsado dhulka danta guud qalabkiisa, meel walba oo waddanka ka mid ah, marka uu dhisayo, dayactirayo ama ka shaqeynayo xarumaha looga baahan yahay gudashada waajibaadka Rukhsadda loo siiyey si waafaqsan shuruudaha iyo xeerarka Rukhsadda la siiyay, si uu u bixiyo adeegga korontada, taas oo ku xiran in:
    a) Rukhsadluhu uu wargeliyo Hay'adda iyo hay'adaha kale ee ku shaqada leh haddii uu rabo in uu kaabayaal koronto ka dhiso dhul dawladeed, ka hor inta aanu shaqada billaabin;
    b) Rukhsadluhu waa in uu u hogaansamaa sharciyada iyo xeerarka qabanaya ee khuseeya maamulka deegaanka iyo saamaynta bulsho ee hawlihiisa uu dhulka dawladeed ka fulinayo sababi karaan.
2) Rukhsadlaha bixiya adeegga korontada wuxuu xaq u leeyahay si waafaqsan Sharcigan in uu dhex marsado qalabkiisa dhulalka sida gaarka loo leeyahay:
    a) Iyada oo oggolaansho la weydiisanayo milkiilaha leh marinka la dhexmarayo.
    b) Rukhsadlaha bixiya adeegyada korontada waxaa ku waajib ah in uu dayactiro dhibka uu u geystay hantida gaarka ah iyo tan guud, sida uu qabo Sharciga Korontada Qaranka.
3) Hay'addu waxay soo rogeysaa xeer-nidaamin lagu qeexayo qaabka loo bixinayo magdhawga lagu hagaajinayo dhibka uu geysato isticmaalka xaqa loo siiyey dhex marsashada qalabka dhulka guud ama kan gaarka ah.
4) Hay'addu waxay leedahay awood ay ku dhegeysato, go'aanna uga gaarto wixii is-afgaran-waa ah ee ka dhasha isticmaalka xaqa marinka ee adeeg bixiyuhu xaqa u leeyahay.

CUTUBKA 10aad: SHIRKADDA KORONTADA QARAN IYO MAREEGTA QARAN

QODOBKA 44aad: SHIRKADDA KORONTADA QARAN

1) Wasaaraddu waa in ay dhiirigelisaa horumarinta Mareegta Korontada Qaran si waafaqsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyeyaashiisa.
2) Waxaa la dhisayaa Shirkad Qaran oo maamusha horumarinta, hawlgelinta, iyo gacan-ku-haynta Mareegta Qaran.
3) Shirkadda Korontada Qaran waxa ay hoos timaaddaa Wasaaradda.

4) Shirkadda ayaa mas'uul ka ah dhammaan hawlaha Gudbinta ee lagu qabto Mareegta Qaran.
5) Shirkaddu waxay qaban kartaa hawlo Dab-dhalin oo dan guud ah, ama ka qayb qaadanaya horumarinta tamarta is-cusboonaysiisa, ama qeyb ka ah ka miradhalinta ujeeddooyinka Wasaaradda ee korontada qaranka.
6) Shirkadda waxa ay qaban kartaa hawlo qaybin taas oo ka qeyb qaadanaysa ka mirodhalinta ujeeddooyinka Wasaaradda ee ku aaddan koronta galinta qaranka.

QODOBKA 45aad: ISKU-XIRKA MAREEGTA QARAN

1) Adeeg-bixiyeyaasha raba in ay ku xirtaan Mareegta Qaran waxay heshiis isku-xir la galayaan maamulka Mareegta Qaran, si waafaqsan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa.
2) Heshiisyada ku-xirashada Hannaanka Gudbinta ayaa noqonaya kuwo ku salaysan hannaan heshiiseed midaysan oo waafaqsan qodobada Sharcigan iyo xeer-nidaamiyaha gudbinta koronta.

QODOBKA 46aad: SHURUUDAHA ISKU-XIRKA

1) Habka ku-xirashada Hannaanka Gudbinta waxaa diyaarinaya Hay'adda ayada oo kaashanaysa Wasaaradda.
2) Haddii uu dhinac ku wax-yeelloobo hannaanka isku-xirka, waxaa u furan in uu cabasho usoo gudbiyo Wasaaradda.
3) Haddii shirkadi bixin waydo khidmadda lagu yeeshay ee ka dhalatay ku-xirashada Hannaanka Gudbinta, waxaa lagu dhaqayaa Sharcigan iyo xeer-nidaaminta Hay'adda iyo Xeerka Madaniga Soomaaliyeed.

QODOBKA 47aad: DIIWAAN-GELINTA HESHIISYADA ISKU-XIRKA

1) Adeeg-bixiyayaasha korontada waxay ka diiwaan-gelinayaan Hay'adda Korontada heshiiska ay ku macaamileen maamulka Hannaanka Gudbinta inta lagu guda jiro muddada uu qeexayo xeer-nidaamiyaha khuseeya.
2) Hay'adda waxay qiimeeyneysaa shuruudaha heshiiska isku-xirka in uu waafaqsan yahay Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha Hay'adda.

QODOBKA 48aad: SHURUUDAHA JARIDDA ISKU-XIRKA

1) Dhinacyada galay heshiiska isku-xirka ee shirkadaha adeegga bixiya iyo maamulka Mareegta Qaran kama bixi karaan heshiiska iyaga oo aan ka haysan ogolaansho qoraal ah Hay'adda Korontada.
2) Hay'adda waxay dhiirrigalineysaa iskaashiga bixiyayaasha adeegga korontada iyo maamulka Mareegta Qaranka.
3) Haddii shirkadaha iyo maamulka Mareegta Qaran ku heshiin waayaan arrimaha kor ku xusan Hay'adda Korontada ayaa soo dhexgaleysa si loo xaliyo khilaafka iyada oo mudnaanta koowaad la siinayo danta guud.

QODOBKA 49aad: HABRAACA ISKU-XIRKA GUDBINTA

1) Hay'adda waxay diyaarineysaa habraaca loo marayo isku-xirka shirkadaha iyo Mareegta Qaran.
2) Habraaca isku-xirka wuxuu kulansanayaa arrimaha soo socda:

a) Waqtiga wada-xaajoodka gunaanadka heshiiska isku-xirka.
b) Tayada qalabka, xaddiga Korontada iyo heerka adeegga.
c) Habraaca dajinta tariifada.
d) Dhawrista lahaanshaha gaarka ah.
e) Ilaalinta sirta ganacsiga
f) Fududaynta xiriirka dhinacyada.
g) Xaddidaadda tariifada isku-xirka marka ay dhinacyadu ku heshiin waayaan.

QODOBKA 50aad: NIDAAMINTA MAREEGTA KORONTADA QARAN

1) Mareegta Qaran waxaa hagaya xeer-nidaamiye gaar ah, waxaana adeegsan kara oo kaliya Rukhsadlaha loo diro dabka uu dhaliyo isagoo isticmaalaya hannaanka gudbinta.
2) Shirkadaha ku xiranaya waxay mas'uul ka yihiin qorsheynta, maalgelinta, naqshadaynta, horumarinta iyo gacan-ku-haynta qeybaha dab marinta ee ay ku leeyihiin Mareegta Qaranka.
3) Wasaaradda waxay dajineysaa qorshayaasha lagu horumarinayo laguna maamlulayo nidaamka gudbinta korontada si ay u daboosho baahida horumarineed ee ka taagan adeegga korontada.
4) Mareegta korontada iyo hannaanka guud ee gudbinta korontadu waxa ay hoostagayaan Wasaaradda, shaqo-gelin iyo horumarin intaba, si waafaqsan xeer-nidaamiyaha Mareegta Korontada Qaran.

CUTUBKA 11aad: DHALINTA IYO QAYBINTA KORONTADA
QODOBKA 51aad: QAYBINTA KORONTADA

1) Shirkad kasta oo haysta Rukhsadda qaybinta korontada waa in ay isticmaashaa qaabka heshiishka ay diyaarisay Hay'adda Korontada Kaas oo ku salcysan xuquuqda iyo mas'uuliyadda Rukhsadlaha iyo macaamiisha.
2) Marka ay diyaarinayso hannaanka heshiishka ee ku xusan farqada (1), Hay'addu waa in ay hubisaa in uu dhameystay shuruudaha heshiishka, sida:
   a) Xadidaadda mas'uuliyadda ka unkamaysa Rukhsadda.
   b) Nidaaminta goynta adeegga koronto.
   c) Nidaaminta cabirka isticmaalka iyo qaan-sheegadka adeegga korontada.
   d) Latashiga iyo ogeysiinta isbadaladda shuruudaha heshiishka.
   e) Xalinta cabashooyinka iyo khilaafaadka.

QODOBKA 52aad: XAQA MARINKA ADEEG BIXIYAHA KORONTO QEYBINTA

1) Ka hor shaqada, Rukhsadlahu waa in uu bixiyaa ogeysiin ku aaddan soo gelidda dhulka uu adeegga marinayo, isla markaana ogolaansho ka haystaa mulkiilaha dhulka.
2) Rukhsadlahu wuxuu xaq u leeyahay gelidda dhul uu ku rakiban yahay qalab koronto si uu baaritaan ama dayactir ugu sameeyo qalabka.
3) Goobaha korontada laga bixiyo ee dhulka hoostiisa ama dushiisa ee la dumiyey waa in lagu soo celiyaa sidoodii hore, waxaana la dulsaaraayaa kharashka dayactirka ku baxaya Rukhsadlaha sababta lahaa.
4) Rukhsadlaha qeybinta korontadu waa in uu dhiso, hagaajiyo, rakibo baallayaalka, fiilooyinka ama xargaha korontada qaada, kuwaas oo ku yaal dhulka hoostiisa, korkiisa,

dhinacyada wadooyinka, iyada oo la raacayo xeer-nidaaminta gudbinta iyo qeybinta dabka.

5) Rukhsadlaha waxaa loo ogol yahay jebinta, jeexidda, iyo qodidda goob kasta oo ka mid ah goobaha uu siiyo korontada, wuxuuna hagaajin karaa khadadka korontada ee ka korreeya ama ka hooseeya jidadka ka dib marka uu fasax ka helo hay'adaha ay khuseyso iyada oo laga rabo inuu ku soo celiyo waddada sida ay ahayd ama uu bixiyo qarashaadka ku baxaya hagaajinteeda si waafaqsan faqrada 5aad ee qodobkan.

QODOBKA 53aad: DAB-DHALINTA

1) Habka dab-dhalinta wuxuu yeelanayaa xeer-nidaamiye u gaar ah oo ay soo saarayso Hay'addu.
2) Iyada oo aan la jabineyn sharcigan, dab-dhaliyaha Rukhsadda qaatay ama laga dhaafay codsigeeda, ayaa dhisan kara, dayactiri kara ama ka shaqeyn kara xarun dab dhalin.
3) Adeegbixiye kasta oo lagu soo qeexay faqradda (2) wuxu koronto ka gadi karaa cid kasta oo awood loo siiyay gudbinta ama qeybinta korontada.
4) Adeeg-bixiye kasta oo lagu soo qeexay faqradda (2) looma diidi karo in uu gudbiyo ama uu qaybiyo korontada uu dheliyay, wuxuuna u hogaansamayaa qodobbada Sharcigan ee la xiriira gudbinta, qeybinta ama ku-xirashada mareegta qaran.
5) Sida kor lagu soo qeexay (1) awoodda koronto dhelinta iyo arrimaha farsamo ee la xiriira waxaa go'aamin doona maamulka hannaanka gudbinta.

QODOBKA 54AAD: XALINTA KHILAAFAADKA

1) Hay'adda waxay si dhexdhexaad ah uga hawl-galaysaa xallinta wixii khilaaf ah ee ka dhex dhasha:
   a) Laba Rukhsadle,
   b) Rukhsadle iyo Shirkadda Qaran, ama
   c) Macmiil iyo Rukhasdle korontada dhaliya, gudbiya, qaybiya ama ka ganacsada.
2) Hay'adda waxay guddi dhexdhexaadin u saaraysa xallinta wixii khilaaf ah ee loo soo gudbiyo, wixii go'aan ah ama tallaabo ah ee uu guddigaasi qaado waxaa loo qaadanayaa inuu yahay mid ka soo fulay Hay'adda.
3) Wasaaraddu waxay dajinaysaa habraacyada ay tahay in loo raaco xallinta wixii khilaaf ah ee ka yimaaddo adeegga korotada.
4) Dhinac kasta oo ku qanci waaya go'aanka guddiga dhexdhexaadineed iyo guud ahaan go'aammada Hay'adda waxaa u furan in uu racfaan uga qaato maxkamadda awoodda u leh.
5) Hay'adda, xilliga ku habboon, iyada oo ka duulaysa go'aan keeda ama cabasho soo gaadhay, waxay samayn kartaa baaritaan ay u xil-saarto qofka ay rabto oo ay ku kabayso intii kale ee looga maarmi waayo, iyada oo ka soo saaraysa warbixin qoraal ah baaritaankaas.

CUTUBKA 12aad: TARIIFADDA, TAYADA ADEEGGA IYO HALBEEGYADA FARSAMO

QODOBKA 55aad: TARIIFADA KORONTADA

1) Si waafaqsan Sharcigan waxay Hey'addu soo saaraysaa xeer-nidaamiyaha tariifooyinka iyo khidmadaha adeegga koronto bixinta.
2) Qaaciidada tariifad dejinta iyo qodobada adeeg bixinta waa in lagu saleeyaa habraacyada maamulka maaliyadeed ee khuseeya.

3) Marka la dejinayo halbeegyada tariifada waxaa lagu xisaab-tamayaa arrimaha soo socda:
   a) In bixiyeyaasha adeegga korontada ee sida habsamida leh u hawlgala ay u suurta gasho in ay so ceshtaan kharashkii ka galay hawlahooda ganacsi isla markaana ay faa'ido macquul ah ka helaan raasamaalkoodii ay maalgashteen.
   b) In la hubiyo in tariifada lagu xisaabiyo kharashyada kala duwan, iyadoo qiimaha tariifada wax laga beddeli karo, si ku-meelgaar ah mararka uu sicirku aad isku badbaddalo.
   c) In tariifada lagu xisaabiyo, haddii ay jiraan, deeqaha iyo lacagaha lagu kabo adeegga koronto dhalinta iyo qaybinta, sidaa awgeedna tariifada qiimeheeda hoos loogu dhigo.
   d) In dhiirrigalin loo sameeyo horumarinta farsamo iyo midda dhaqaale ee adeegga korontada iyo sare u qaadidda tayada adeeg-bixineed.
   e) Hanaanka tariifada waa inuu noqdaa mid ogolaanaya qeybo kala duwan oo ka mid ah macaamiisha in ay iska kaabaan kharashka iyo lacagaha tariifada.

QODOBKA 56aad: HALBEEGYADA TAYADA BIXINTA ADEEGGA KORONTO

1) Hay'adda Korontada qaranka waxay dejineysaa halbeegyo haga tayada koronto, midda adeeg iyo tan dhaqaale ee koronto bixinta:
   a) Halbeegyada tayada koronto waxaa ka mid noqonaya heerka qulqulka koronto oo noqda heerkii ku haboonaa.
   b) Tayada adeeg waxaa qeyb ka noqonaya saacadaha adeegga koronto, jaridda korontada, muddada ay go'naanayso, nabadgelyada iyo bedqabka qalabka korontada.
   c) Tayada dhaqaale waxaa ka mid noqonaya waqtiga ay qaadato galinta korontada, cabirka saxan ee isticmaalka korontada, qaabka hufan ee khidmad ururinta iyo cabashooyinka macaamiisha oo waqti macquul ah wax laga qabto.
2) Halbeegyada ay hay'adda u dejinayso tayada bixinta adeegga koronto waa in ay noqdaan kuwo u danaynaya macaamiisha, ayna dhaqangalin karaan bixiyeyaasha adeegga korontada isla markaana ah mid si cilmiyaysan loo qiimayn karo.
3) Hay'addu waxay awood u leedahay in ay go'aamiso hannaanka kor loogu qaadayo tayada korontada isla markaana muddayso heerarka tayo ee ay xilli ka xilli soo rogto.
4) Halbeegyada tayada korontada waxa ay noqon karaan kuwo ku jaan-go'an noocayada kala duwan ee macaamiisha, deegaannada iyo farsamooyinka dhalinta korontada. Qeybqeybintaasi waa in ay marwalba ku salaysnaato tignoolajiyadda iyo dhaqaalaha, waana in ayna gooni u soocin macmiil gaar.
5) Markii ay dejinayso halbeegyada haga tayada korontada, Hay'addu waa in ay danta macaamiisha mudnaanta siisaa, iyada oo tixgalinaysa baahida ay u qabaan edeegga iyo awooddooda dhaqaale.

QODOBKA 57aad: HALBEEGYADA FARSAMO

1) Iyada oo lala tashanayo adeeg-bixiyeyaasha iyo daneeyayaasha kale ee ay khusayso, Hay'addu waa in ay soo saartaa xeer-nidaamiye lagu nidaamiyo dhismaha, hawlgalka, iyo dayactirka kaabayaasha korontada.
2) Dhammaan kaabayaasha korontada ee cusub waa in ay u hoggaansamaan xeerarka farsamada.
3) Kaabayaasha jira waa in si tartiib tartiib ah loo cusboonaysiiyaa si loogu hoggaansamo xeerarka farsamada.

4) Habka iyo waqtiga loogu talagalay cusboonaysiinta horumarinta ah waxaa go'aan ka gaaraya Hay'adda iyada oo la tashanaysa adeeg-bixiyeyaasha.

CUTUBKA 13aad: XUQUUQDA SHIRKADAHA KORONTADA IYO MACAAMIISHA

QODOBKA 58aad: XUQUUQDA SHIRKADAHA KORONTADA

1) Si waafaqsan shuruucda maalgashiga dalka waa in la dhiirrigeliyaa, lana ilaaliyaa xuquuqda shirkadaha korontada waddaniga ah iyo guud ahaan maalgashadayaasha.
2) Wasaaraddu waxay ka ilaalineysaa shirkadaha korontada wadaniga ah in uu ku yimaado burbur, khasaare ama hoos u dhac sababtiisu tahay tartan sharci darra ah ama maalgashade shisheeye ka yimid.
3) Si loo ilaaliyo dhaqaalaha shirkadaha korontada dalka, waxay Wasaaraddu soo saareysaa xeer-nidaamin u gaar ah.
4) Shirkaduhu waxay samaysan karaan dallad ay ku midaysan yihiin shirkadaha bixiya adeegga korontada dalka.

QODOBKA 59aad: XUQUUQDA MACAAMIISHA

1) Wasaaraddu waxaa ay ilaalinaysaa xuquuqda macaamiisha.
2) Macaamiishu waxaa ay xaq u leeyihiin in ay helaan koronto ku filan, taya leh, qiimiheeduna jaban yahay.
3) Qiimaha tariifadda korontada dadweynaha laga qaadayaa waa in ay ku xaddidnaataa qiimaha suuqa iyada oo la dhowrayo xuquuqda macaamiisha.
4) Macmiil kasta oo ku waxyeellooba khatar ka dhalatay adeeg koronto, lana xaqiijiyo in uu macmiilku masuuliyadda lahayn, waxaa magdhabaya cidda sababtay. Hay'addu waa inay xaddidaa xaaladaha iyo shuruudaha gaarka ah ee magdhawyada.
5) Xargaha korontada ee mara khadadka hoose iyo kuwa kore waa in ay ahaadaan kuwa xafidan oo si joogto ah loo dayactiro si looga ilaaliyo bulshada khataraha kaga imaan kara.
6) Shirkadaha waxaa waajib ku ah ilaalinta badqabka nafta, maalka macaamiilka iyo ka deegaankaba.
7) Waxaa reebban takoor, ku xad gudub ama waxyeello kasta ee loo geysto macmiilka.
8) Si loo ilaaliyo xuquuqda macaamiisha waxay hay'addu diyaarineysaa xeer-nidaamiye u gaar ah macaamiisha iyo badbaadada bay'ada.

CUTUBKA 14aad: TARTANKA

QODOBKA 60aad: TARTAN XOR IYO XALAAL AH

1) Hay'addu waxay hubinaysaa in shirkadaha korontadu ay helaan tartan xor ah oo hufan, waafaqsanna Sharciga iyo xeer-nidaamiyeyaasha.
2) Hay'adda waxay kormeeraysaa, go'aanna ka gaareysaa, iyadoo hubinaysa in dhammaan adeeg-bixiyeyaasha u hoggaansameen shuruucda tartanka xorta ah iyo habka uu u nidaamiyay Sharcigan iyo xeer-nidaaminta Hay'adda iyadoo marwalba la ilaalinayo hannaanka cadaaladda, xaqa lahaanshaha iyo maamulidda xarumaha korontada gaarka ah.

QODOBKA 61aad: KU-TAKRIFALKA AWOODDA SUUQA

1) Waxaa ka reebban Rukhsadle kasta oo bixiya adeeg koronto, in uu ku kaco fal ujeeddadiisu tahay in lagu wax yeeleeyo tartanka suuqa xorta ah.
2) Waxaa ka reeban in Rukhsadle bixiya adeeg koronto uu galo heshiis ama ballanqaadyo ujeeddadoodu tahay in hoos loo dhigo tartanka suuqa Korontada dalka.
3) Haddii ay Hay'addu u aragto, kaddib dhageysi iyo wada-tashi ay la yeelato adeeg-bixiyeyaasha si waafaqsan Sharcigan, in Rukhsadle koronto uu ku kacay falal ujeeddadoodu tahay khasaarin hantiyeed oo suuqa ganacsiga korontada ku timaadda, Hay'addu waxay qaadeysaa talaabooyinka soo socdo:
    a) Ku soo rogitaan ganaax lacageed oo ay Hay'addu xaddido iyada oo tixgelinaysa wax yeellada uu suuqa u geystay.
    b) Haddii Hay'addu u aragto in wax yeellada uu geystay falkaas ka dhalan karto dhibaato loo gaystay cid kale, waxaa loo gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh si ay go'aan uga gaarto inta uu gaarsiisan yahay fal-dembiyeedkaas, cawaaqibta ku habboon iyo in ay xaddido magdhawga ka dhalan kara khasaaraha uu geystay.

QODOBKA 62aad: DIIWAANGELINTA MACMIILKA KORONTO

1) Shirkadaha korontada waxay diiwaangelinayaan dhammaan macaamiisha helaya adeegga koronto marka uu Sharcigan dhaqangalo, si loo sugo milkiyadda iyo xuquuqda gaarka ah ee macmiilka.
2) Si loo fuliyo tilmaanta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagama maarmaan ah in uu haysto macaamilku kaarka aqoonsiga ama wax sugi kara aqoonsigiisa.

CUTUBKA 15aad: DEEGAANKA, CAAFIMAADKA, IYO BEDQABKA

QODODBKA 63aad: DEEGAANKA

1) Dhammaan hawlaha koronto waa in loo qabtaa qaab lagu yaraynayo saameynta taban ee deegaanka iyo bulshada. Qiimaynta saamaynta deegaanka iyo bulshada waa in loo eegaa si waafaqsan Sharcigan iyo xeerarka khuseeya.
2) Adeeg-bixiyeyaasha iyo Shirkadda Qaranku waa in ay u fuliyaan hawlahooda si waafaqsan dhammaan sharciyada iyo xeerarka khuseeya ilaalinta deegaanka.
3) Dhacdooyinka waaweyn ee deegaanka waa in si degdeg ah loogu wargeliyaa Hay'adda.

QODOBKA 64aad: CAAFIMADKA IYO BADQABKA

1) Dhammaan hawlaha laga fulinayo suuqa korontada waa in loo qabtaa qaab lagu yaraynayo khatarta korontadu ku keeni karto caafimaadka, badqabka shaqaalaha iyo dadweynahaba.
2) Adeeg-bixiyeyaasha iyo Shirkadda Qaranku waa in ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka macquulka ah ee ay dadka iyo hantida uga ilaalinayaan waxyeellada ka dhalan karta hawlahooda.
3) Shilalka waaweyn ee saamaynta ku leh caafimaadka iyo badqabka shaqaalaha, dadwaynaha, ama hantida guud iyo tan gaarka ah, waa in isla markiiba lagu wargeliyaa Hay'adda.

CUTUBKA 16aad: KORONTO DIRISTA HEER-GOBOL

QODODBKA 65aad: XARRUMAHA KORONTO DIRISTA HEER-GOBOL

1) Hay'addu waxay dhiseysaa xarumo koronto diris oo heer-gobol ah si ay u korjoogtyaso Mareegta qaran una miisaanto suuqa korontada ee deegaan kasta.
2) Hay'adda Korontada Qaranku waxay diyaarinaysaa hannaanka maamul iyo midka farsamo ee xarumahan lagu dhisayo shaqadoodana ku salaysnaan doonto.
3) Dhisidda iyo maamulka xarumahan waxaa loo marayaa iskaashi lala yeesho shirkadaha adeeg-bixinta iyo maamullada heer gobol.

QODOBKA 66aad: XARUNTA DIRISTA KORONTO EE HEER-GOBOL

1) Xarunta koronta dirista heer-gobol waa in ay hubiso isdhexgalka howleed ee xarumaha koronta qaybinta gobolka ay khuseyso.
2) Waa in xaruntaan u hogaansanaato mabaadii'da, habraaca iyo qaababka khuseeya gudbinta korantada Mareegta Qaran oo ay ku jirto xaddiga koronto ee habboon iyo jadwalladooda.
3) Xarunta koronto dirista heer-gobol waxay ka mas'uul tahay:
    a) Samaynta jadwalka iyo xaddiga korontada la dirayo ee gobolka dhexdiisa.
    b) Kormeeridda isdhexgalka Mareegta Qaran.
    c) Diiwaangelinta xaddiga koronto ee laga helay ama loo diray xarumaha koronto dhalinta iyo mareegaha hoose ee ku xiran mareegta qaran.
4) Intaasba waa in la hirgeliyaa iyada oo loo marayo qaab tixgelinaya xaaladda amni iyo midda dhaqaale ee gobolka, si la jaanqaadaysa xeerarka iyo sharciga Mareegta Qaran iyo heshiisyada caalamiga ee la xiriira.

CUTUBKA 17aad: DHAQAN GALKA SHARCIGAN

QODOBKA 67aad: XAALADAHA KA HORREEYAY SHARCIGAN

1) Cidna laguma qaadi karo ganaax kasta oo ka dhashay falal ama talaabooyin uu reebay Sharcigan, falalkaas oo dhacay ka hor dhaqan-galkiisa, hase yeeshee waxaa la waafajinayaa sharcigan falkii dhaca kaddib marka uu dhaqan-galo.
2) Muddada u dhaxaysa dhaqangalka sharcigan iyo dhismaha Hay'adda, Wasaaraddu waxay maamulaysaa codsiyada Rukhsadaha iyo bixintooda.

QODOBKA 68aad: Baabiin

Waxa la baabiiyey Xeer Lr. 34 ee soo baxay Abriil 7, 1973 iyo Xeer kasta oo ka hor imaanaya sharcigan

QODOBKA 69aad: DHAQAN-GALKA SHARCIGAN

Sharcigan waxa uu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

SHARCI LR.003
ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA NABADSUGIDDA IYO SIRDOONKA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/802/B11/23**, ku taariikheysan **28/02/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka**.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Ansixinta Hindise Sharciyeedka Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Muqdisho, 08 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-025-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA

HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA NABADSUGIDDA IYO SIRDOONKA QARANKA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
07 FEB 2023
SOO GELID/RECEIVED

CUTUBKA 1AAD: HORDHAC
QODOBKA 1AAD: EREY BIXIN

Ereyada soo socda, haddii aan Sharcigan gudihiisa si kale loogu fasirin, waxaa loola jeedaa erey kasta fasiraadda ku hor qoran:

1) AgaasimahaGuud/**Taliyaha:** Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka (HNSQ).
2) **Dabagal:** la socosho gaar ah oo ay Hay'addu saarto cid ama ***goob*** ay tuhunsan tahay ama ay dareen ka qabto.
3) **Dastuurka**: Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
4) **Golaha Wasiirrada:** Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka ee Soomaaliya.
5) **Hubin Amni:** Waxaa loola jeedaa Xaqiijin ay Hay'addu ku sameyso qof ama goob si waafaqsan sharciga
6) **Jamhuuriyadda**: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
7) **Jirdil:** Waxaa loola jeedaa Fal kasta oo sababi kara xanuun daran, dhaawac jireed ama dhib maskaxda, garashada iyo dareensidayaasha la gaarsiiyo, oo si ula kac ah loogu gaystay qof iyada oo laga leeyahay ujeeddo:
    (b) In laga helo xog ama qiraal qasab ah;
    (t) Ku ciqaabidda qofka ficil isagu uu gaystay ama qof kale oo lala xiriirinayo uu gaystay ama looga shakiyey in uu gaystay;
    (j) Handadaad ama qasbid loo geysanayo qofka ama qof lala xiriirinayo;
    (x) Sabab ku salaysan faquuq nuuca uu rabo ha ahaado.
8) **Joojin**: Hakin waqti kooban oo aan 48 saac ka badneyn ay Hay'addu ku sameyso dhaq-dhaqaaqa qof uu tuhun maangal ah soo galay;
9) **Madaxweynaha**: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.
10) **Qabasho:** Gacan ku dhigis qof ama wax ay Hay'addu ku raad joogtay, tuhuntay ama ay fal-dambiyeed ku heshay;
11) **Xeer-nidaamiye:** Xeer-nidaaminayaha howlaha Hay'adda ama barnaamij ku mataaneysan oo uu soo saarayo Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 99aad, Faqradda (b) ee Dastuurka iyo Sharcigaan;
12) **Xeer-Hoosaad:** Xeer maamul oo hagaya howlaha Hay'adda oo uusoo saaro Agaasimaha Guud/ Taliyaha si waafaqsan Sharcigaan
13) **Xubin**: Qof kasta oo ka tirsan Hay'adda oo lagu shaqaaleeyey/Ciidameyay si waafaqsan Sharcigan iyo Xeernidaamiyaha/Xeer-hoosaadka Hay'adda;
14) **Xuuraan:** Xog ururin dahsoon oo ay Hay'addu ku sameyso cid ay tuhuntay, xaalad jirta, ama qof ay masuul ka tahay amnigiisa gaarka ah si ay xaaladdiisa ula socoto;
15) **Xog Qarsoodi ah**: Waxaa loola jeedaa Xog xasaasi ah taas oo bixinteedu khatar ku tahay amniga iyo danaha qaranka Soomaaliyeed.
16) **Hay'adda:** Hay'adda/Taliska Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka Ee Sharcigaan dhisayo.
17) **Danaha Qaranka:** Waxaa loola jeedaa Bedqabka Qaranka Soomaaliyeed, Sarreynta Dastuurka Dalka, Ilaalinta Madaxbanaanidda Siyaasadeed, Dhaqaale, Bulsho, xuduudaha iyo Khayraadka dabiiciga ah.
18) **Kaaliye:** waxaa loola jeeda mid ka mid kaaliyayaasha Agaaasimaha guud/Taliyaha HNSQ ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 16aad ee Sharcigaan.
19) **La-taliye:** Waxaa loola jeedaa shaqsi leh aqoon sare iyo khibrad ballaaran howsha loo igmadayna takhasuskeeda leh.

QODOBKA 2AAD: AWOODDA SOO SAARIDDA SHARCIGAN

1) Si waafaqsan Qodobka 126, Faqradda 1aad (b) iyo Faqradda (2) ee Dastuurka, Barlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa uu soo saaray Sharciga Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka oo dib loogu dhisayo Hay'addii Nabadsugidda Qaranka;
2) Sharcigan waxaa uu ka dhaqangalayaa guud ahaan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sharcigaan waxa uu nidaaminayaa dhismaha, shaqada, awoodaha iyo arrimaha kale ee la xiriira Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka.

QODOBKA 3AAD: MABAADII'DA HAGEYSA

1) Hay'addu, iyada oo gudanaysa waajibaadkeeda, ilaalinaysa xorriyadaha iyo xuquuqda asaasiga ah ee uu bixinayo Cutubka 2aad ee Dastuurka; u hoggaansamaysa mabaadii'da ciidammada amaanka ee ku xusan Qodobka 127aad ee Dastuurka, waxa ay shaqadeeda inta ay ku jirto:
   (b) U howlgeli doontaa in xubnaheedu ku shaqeeyaan heerka ugu sarreeya ee hufnaan iyo anshax wanaag;
   (t) Ka fogaaneysaa musuqmaasuqa, eexda iyo heyb-sooca, waxa ayna ku dhaqmaysaa hufnaan iyo isla xisaabtan dhexdeeda ah;
   (j) Ilaalinaysaa xorriyadaha iyo xuquuqaha asaasiga ah ee Dastuuriga ah, xuquuqaha ay bixinayaan heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya qayb ka tahay iyo shuruucda dhaqangalka ah;
2) Hay'addu waxa ay awoodaheeda iyo shaqooyinkeeda u gudanaysaa si ay ku jirto danta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3) Hay'adda, xubnaheeda, iyo cid kasta oo la shaqeysa marna kama shaqaynayaan hawlo ka soo horjeeda Dastuurka, Nuxurka Dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka, mana qaadanayaan Amarro aan waafaqsanayn Dastuurka iyo Shuruucda kale ee dalka.

CUTUBKA 2AAD: QAAB-DHISMEEDKA, ASTAANTA IYO CALANKA HAY'ADDA

QODOBKA 4AAD: DIB U DHISKA HAY'ADDA

1) Sharcigaan waxa uu dhisayaa **"Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka** afka carabigana waxa uu ku noqonayaa **"جهاز المخابرات والامن القومي"** halka afka Ingiriiskana uu ku noqonayo **"National Intelligenc and Security Agency"** loona soo gaabin doono **"NISA"**, Sharcigaan dhexdiisana waxaa loogu yeeri doonaa **"Hay'adda"**;
2) Hay'addu dabeecad ahaan waa hay'ad amni oo heer Federaal ah, waxa ayna hoggaanno si toos ah u hoos yimaada ku yeelaneysaa dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka;
3) Dhammaan howlaha iyo waajibaadka Hay'adda waxaa si toos ah uga masuul ah uguna madax-bannaan Agaasimaha Guud/Taliyaha ee Hay'adda;
4) Hay'adda waxaa ku soo wareegaya masuuliyadda dhammaan shaqaalihii Hay'addii Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka ee Sharcigaan hortiis shaqaynayey, sidaas oo kale Hay'adda waxaa ku soo wareegaya dhammaan hantida guurtada iyo ma guurtada ah oo Hay'adda faqraddaan ku xusan horay u lahaayeen;
5) Hay'addu waxa ay yeelanaysaa shakhsiyad qaanuuni ah, waxayna u gudanaysaa shaqadeeda iyo waajibaadkeeda si waafaqsan Sharcigaan.

QODOBKA 5AAD: ASTAANTA & CALANKA HAY'ADDA

1) Hay'addu waxa ay leedahay astaan iyo shabbad u gaar ah. Sida ku cad lifaaqa kowaad ee Sharcigaan la socda, astaanta Hay'adda waxa ay ka kooban tahay:
   (b) Shimbir (Hud-hud) ah oo taagan, labada garab iyo dibkuna u fidsanyihiin; Labada garab ee Hud-hudka waxa ay leeyihiin min sagaal baal, oo foodda ka wada madow;
   (t) Gaashaan midabkiisu yahay buluug furan, ayaa saaran laabta Shimbirka Hud-hudka ah iyo labo waran oo isweydaarsan oo caaradoodu kor u jeedo oo saaran dhabarka Hud-hudka.
   (j) Xiddig cad oo shan gees leh ayaa ku taalla bartamaha gaashanka;
   (x) Magaca Hay'adda iyo tarjumaadiisa oo English ku qoran (National Intelligence and Security Agency) iyo soo gaabintiisa (NISA) oo laba xiddig oo buluug ah labada dhinac ka xigaan, qaab wareeg ahna ugu dhex qoran diillin midabkeedu yahay casaan furan;
   (kh) Labo suun oo midabkoodu yahay kafee laguna dhex qoray kan kore magaca dalka oo Soomaali ah (SOOMAALIYA), Kan hoosana ayaad Qur'aanka ah (رَبِّ اجْعَلْ هَٰذَا بَلَدًا آمِنًا)
2) Hay'addu waxa ay leedahay calan leydi cad ah oo dhexda ku leh astaanta Hay'adda.

QODOBKA 6AAD: QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA

1) Qaab-dhismeedka Hay'addu waxa uu ka kooban yahay Agaasimaha Guud/Taliyaha, Kaaliyayaal, Agaasinno/Taliye Qayb, Hoggaanno/Waaxyo, Laamo iyo Xafiisyo sida ku cad jaantuska ka muuqdo lifaaqa labaad ee la socda Sharcigaan;
2) Hay'adda waxa ay ku yeelaneysaa dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka xaafiisyo iyo talisyo heerkoodu yahay hoggaanno, xeryo, iyo xarummo baaris; waxa ayna ka howlgaleysaa dhammaan gobollada dalka, dagmooyin iyo heer walba oo maamul deegaan ah.
3) Guud ahaan habraaca wadashqeynta kaaliyayaasha, agaasinnada, hoggaannada, waaxyaha, laamaha iyo xafiisyada kala duwan ee Hay'adda, xilka iyo waajibaadkooda waxaa nidaaminaya xeer-hoosaadyo uu soo saaro Agaasimaha Guud/Taliyaha.

CUTUBKA 3AAD: SHAQADA & WAAJIBAADKA HAY'ADDA
QODOBKA 7AAD: SHAQADA HAY'ADDA

Hay'addu waxa ay ka shaqeyneysaa ilaalinta danaha qaranka ee dalka guduhiisa iyo dibaddiisa, iyada oo u howlgaleysa:

1) Ilaalinta sirta qaranka Soomaaliyeed;
2) Ururinta, gorfeynta, iyo keydinta xogaha ahmiyadda gaarka ah u leh amniga iyo horumarka qaranka Soomaaliyeed nooc kasta oo ay ahaato;
3) Diyaarinta warbixinno iyo daraasaad joogta ah oo ka turjumaya xaaladaha amni ee dalka ka jira ee dhabta ah, lana wadaagto madaxda qaranka iyo dhinacyada kale oo ay tahay in ay gaarto xogta la helay;
4) Dabaggalka iyo baarista dhammaan dhaq-dhaqaaqyada, dhacdooyinka, iyo xaaladaha taabanaya amniga qaranka Soomaaliyeed, dalka gudihiisa iyo dibadda intaba;
5) Ilaalinta amniga gaarka ah ee masuuliyiinta sar-sare, iyo goobaha sida gaarka ah muhimadda ugu leh qaranka Soomaaliyeed, cadawguna uu tilmaansanayo, iyo ka qeybqaadashada sugidda amniga dalka si waafaqsan dabeecadda Sirdoon ee Hay'adda;
6) Kashifidda iyo ka hortagga dibindaabyada iyo burburinta lagu waxyeeleynayo amniga, sumcadda, madaxbannaanida, danaha iyo karaamada umadda Soomaliyeed oo ay ka wadaan ururrada argagixisada ah, dowladaha shisheeye, danbiilayaasha abuubulan iyo cid kasta oo cadaw u ah Dalka Soomaaliya, gudaha iyo dibadda;

7) Iskaashiga caalamiga ah iyo kan goboleed ee la xiriira isla shaqeynta hay'adaha dhiggeeda ah qaab u adeegaya danaha Qaranka Soomaaliyeed iyo xasilloonida gobolka iyo caalamka;
8) Siinta xogaha iyo talooyinka khuseeya arrimaha amniga oo ay u baahan yihiin laamaha Dowladda Soomaaliya iyo kuwa gaarka loo leeyahay;
9) Kala shaqeynta hay'adaha amniga ee kale si ay u ogaadaan ugana hortagaan dambiyada waaweyn iyo khataraha ku wajahan amniga qaranka, si waafaqsan dabeecadda Sirdoon ee Hay'adda;
10) U fidinta laamaha Dowladda wixii adeeg xuuraan ah, ama xiriir la leh shaqada Hay'adda oo ay u baahdaan;
11) La dagaallanka argagixisada iyo guud ahaan ururrada iyo kooxaha mugdiga ku shaqeysta, lid-na ku ah amniga qaranka si waafaqsan dabeecadda iyo shaqada Hay'adda.

QODOBKA 8AAD: AWOODAHA HAY'ADDA

1) Hay'addu waxa ay yeelanaysaa dhammaan awoodaha aan looga maarmin ama faa'idada u leh shaqadeeda si waafaqsan Dastuurka, Sharcigaan iyo qawaaniinta dalka;
2) In ay ka hesho cid kasta xogta ay uga baahato nuuca ay ahaataba, isla markaana ay daalacato, keydsato ama ay ka gudato waajibkeeda marka ay hesho oggolaansho maxkamadeed.
3) Inay xuuraan, dabaggal iyo fatashaad ku sameyso ciddii ay u aragto in ay ku howlan tahay wax liddi ku ah amniga iyo xasilloonida Dalka;
4) Markii ay hesho Waaran maxkamdeed, inay dhageysato, hubiso, ama ay dabaggal ku sameyso xiriirrada isgaarsiinta, internetka iyo boostada cid walba oo uu soo galo tuhun khatar ku ah amniga iyo danaha qaranka;
5) In ay u yeerto, wareysato, ama wardhalis aan jirdil iyo midiidin laheyn la yeelato qof kasta oo tuhun soo galo, iyo in ay keydsato xogta ay ka hesho si waafaqsan Sharcigaan;
6) In ay qabato, joojiso, ama xakameyso dhaq-dhaqaaqa ciddii ay u aragto in ay khatar ku tahay amniga iyo xasilloonida; si loo sameeyo baaris dhammeystiran, hase yeeshee waa in lagu helo qofka la qabanayo ama la joojinayo ama la xakameynayo dhaqdhaqaaqiisa caddeymo ama xogo hordhac ah oo keeni kara tuhun weyn, islamarkaana waa in ogolaansho baaris iyo sii hayn looga helaa garsoorka ku shaqada leh haddii qofka la haynayo muddo ka badan 48 saac;
7) In ay fatashaad ku sameyso guriga, gaariga, ganacsiga, goobta gaarka ah, qalabka isgaarsiinta, kumbuyuutarrada iyo guud ahaan wax walba oo khuseeyo tuhmanaha ay Hay'addu si waafaqsan faqradaha ku xusan Cutubka 2aad ee Dastuurka
8) In ay qabato, joojiso ama ay hakiso hantida loo arko in dhaq- dhaqaaqeedu uu khatar ku yahay amniga iyo xasilloonida Dalka marka la helo caddeymo hordhac ah oo keeni kara tuhun weyn si waafaqsan Sharcigaan; waa in loo helaa go'aan garsoor oo sababaysan haddii muddo ka badan 72 saacadood ay Hay'addu hakineyso dhaq- dhaqaaqa hantidaas;
9) Hubinta iyo la socoshada shaqaalaha rayidka ah iyo ciidanka ay qoranayaan ama ku soo biiraya hay'adaha kala duwan ee dowladda, iyo guud ahaan masuuliyiinta xilalka kala duwan ee dowladda loo magacaabayo markii loo baahdo in lagu sameeyo hubin amni;
10) Hubinta amniga iyo howlaha shirkadaha ganacsiga ee fidiya adeegyada asaasiga u ah nolasha bulshada sida: biyaha, korontada, cuntada, dawada, shidaalka, isgaarsiinta, rugaha caafimaadka, waxbarashada, hoteelada iyo goobaha lagu nasto.
11) La socoshada iyo hubinta shaqada iyo shaqaalaha hay'adaha iyo shirkadaha ajnabiga ah ee ka shaqeeya samafalka, ganacsiga iyo horumarinta;
12) Hubinta amni ee lagu sameeyo ajaanibta qaadanaya deganaashaha, iyo jinsiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

13) Isticmaalka hub iyo cudud ciidan, iyo sameynta howlgallo amni oo hubeysan marka loo baahdo si waafaqsan qodobka 28-aad, faqradiisa 3-aad.

CUTUBKA 4AAD: QORISTA, MAGACAABIDDA IYO ARRIMAHA XUBNAHA

QODOBKA 9AAD: MAGACAABIDDA AGAASIMAHA GUUD

1) Hay'adda waxaa hoggaaminaya Agaasime Guud/Taliyaha, Golaha Wasiirrada ayaana soo jeedinaya magacaabistiisa, ka dibna waxaa lagu magacaabayaa xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu soo saarayo si waafaqsan Qodobka 117aad, Qodobka 90aad, Faqradda (k) ee Dastuurka;
2) Agaasimaha Guud/ Taliyaha waxaa loo magacaabi karaa qof ciidan ah ama rayid ah marka uu soo buuxiyo shuruudaha ku xusan Sharcigaan;
3) Xil ka qaadista Agaasimaha Guud/ Taliyaha, waxaa soo jeedinaya Golaha wasiirada ee Xukuumadda JFS, si waafaqsan Dastuurka, Qodobkiisa 90aad, faqardiisa (c), waxaana xilka ka qaadaya Madaxweynaha JFS.

QODOBKA 10AAD: SHURUUDAHA AGAASIMAHA GUUD

Qofka loo magacaabayo xilka Agaasimaha Guud/Taliyaha ee Hay'adda waa in uu soo buuxiyaa shuruudaha soo socda:

4) Waa in uu soo buuxiyo shuruudaha xubinnimada Hay'adda ee ku xusan Qodobka 17aad ee Sharcigan;
5) Waa in aan da'diisu ka yareyn 35 sano kana weyneyan sanadka howlgabka si waa faqasan xeer ka hawl gabka;
6) Waa in uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed oo uu ka qaatay jaamacad laga aqoonsan yahay dalka ay ku taal ama ka diiwaan gashantahay ama Aqoon Ciidan oo u dhiganta
7) Waa in uu leeyahay khibrad shaqo oo aan ka yareyn toban (10) sano xiriirna la leh shaqada Hay'adda ama xil sare ka soo qabtay hay'adaha kale ee dowladda;
8) Waa in uu xog-ogaal u yahay xaaladda guud ee dalka.
9) Waa in uusan ku dhicin xukun maxkamadeed oo ka reebaya in uu qabto xil dowladeed;
10) Waa in uusan laheyn xiriir taban oo kala dhaxeeya dalal iyo sirdoonno ajanabi ah oo loo hayo caddeymo ama leh sooyaal muuqda.

QODOBKA 11AAD: WAAJIBAADKA AGAASIMAHA GUUD

Si waafaqsan Sharcigaan, Agaasimaha Guud/Taliyaha waxaa ku waajib ah in uu si hufan u guto waajibaadka soo socda:

1) Waxa uu masuul ka yahay maamulka, maaraynta iyo hawlgallada guud ee Hay'adda;
2) In uu qaado dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah si loo hubiyo in falalka Hay'addu ku koobaan yihiin shaqada Hay'addu u xilsaaran tahay oo kaliya si waafaqsan Dastuurka, Sharcigaan iyo qawaaniinta kale ee dalka;
3) Jaangoynta qorshaha guud ee Hay'adda si waafaqsan siyaasadda guud ee amniga qaranka; waana in uu qorshuhu ahaado sanadle leh halbeegyo si fudud looga dheehan karo waxqabadka Hay'adda dhammaadka sanad walba;
4) Diyaarinta iyo soo gudbinta miisaaniyadda guud ee Hay'adda;
5) Soo saarista amarrada guud, kuwa gaarka ah iyo go'aannada maamul ee lagu socodsiinayo shaqada Hay'adda si waafaqsan Sharcigaan iyo Dastuurka dalka;
6) La talinta Madaxweynaha, Guddoonka Baarlamaanka, Golaha Wasiirrada iyo masuuliyiinta kale arrimaha ku saabsan amniga;

7) Wixii waajibaad kale ah ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda ama Golaha Wasiirrada u xil saaraan si waafaqsan Sharcigaan iyo Dastuurka.

QODOBKA 12AAD: AWOODAHA AGAASIMAHA GUUD

Agaasimaha Guud/Taliyaha waxa uu leeyahay awoodaha soo socda:

1) Waxaa uu magacaabaa guud ahaan xilalka Hay'adda si waafaqsan Sharcigaan, Dastuurka iyo shuruucda dalka;
2) Waxa uu si buuxda u matalaa Hay'adda;
3) Waxa uu xil ka qaadis iyo shaqo ka joojin ku sameeyaa masuuliyiinta xilalka ka haya Hay'adda isaga oo raacaya Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha iyo xeer-hoosaadka Hay'adda;
4) Waxa uu keyd galiyaa xubnaha muteystay ama laga maarmi waayey in keyd la galiyo si waafaqsan xeer-nidaamiyaha;
5) Waxa uu shirguddoomiyaa shirarka joogtada ah iyo kuwa aan joogtada aheyn ee Hay'adda;
6) Waxa uu leeyahay awoodda soo saaridda iyo maareynta maaliyadda si waafaqsan Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha iyo xeer-hoosaadka ee Hay'adda;
7) Waxa uu soo saaraa amarrada la xiriira howlgallada gaarka ah oo ay fulinayaan ciidammada Hay'adda iyo gaashaanbuurta caawiya ama iskaashigu kala dhaxeeyo;
8) Waxa uu leeyahay isticmaalka awood kasta oo uu siiyo Sharcigaan iyo gudashada waajib kasta oo ka saaran ilaalinta Sharcigaan, xeer-nidaamiyayaasha iyo xeer-hoosaadyada Hay'adda;
9) Waxaa u furan in uu qeyb ahaan awoodihiisa, si joogta ah ama ku meelgaar ah, ugu xilsaarto kaaliyeyaashiisa iyo xubnaha kale ee Hay'adda, waana in uu qoraal rasmi ah ku caddeeyo awoodda xubinta loo xilsaaray iyo muddada ay soconayso oo faafinta Hay'adda la galiyo.

QODOBKA 13AAD: ARRIMAHA KA REEBBAN AGAASIMAHA GUUD

Agaasimaha Guud/Taliyaha waxaa ka reebban inta uu xilka hayo:

1) In uu qabto xil dowladeed kale ama uu sii hayo xil kale oo uu horay u haycy;
2) In uu magaca Jamhuuriyadda ku galo heshiisyo qarsoodi ah oo uusan ogalaasho u haysan;
3) Bixinta ama ku dheefsiga gaarka ah ee hantida Guurtada iyo maguurtada ah ee Hay'adda.
4) Xil ka qaadista, shaqo ka joojinta, xaq-duudsiinta iyo xarigga xubnaha ee aan waafaqsaneyn Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha iyo xeer-hoosaadyada Hay'adda;
5) In uu iibsado ama ijaarto hantida Hay'adda ama mid dowladeed guud ahaan si shakhsi ah;
6) In uusan magaca Hay'adda ku geli karin heshiis ganacsi oo aan marin habraacyadii loo baahnaa.

QODOBKA 14AAD: XIL-WAAYISTA AGAASIMAHA GUUD

1) Agaasimaha Guud/Taliyaha waxa uu xilka ku weyn karaa oo keli ah:
   (b) In uu geeriyoodo ama uu sabab caafimaad darteed u gudan waayo waajibaadkiisa muddo 90 cisho ka badan;
   (t) In xilka laga qaado, si waafaqsan Qodobka 9-aad, Faqradiisa 3-aad;
   (j) In uu galo ama ku dhaco arrin ka mid ah arrimaha ka reebban Agaasimaha Guud/Taliyaha ee ku cad qodobka 13aad ee Shacigaan;
   (x) In uu ku dhaco xukun Ciqaabeed oo kama dambays ah;
2) Haddii xilka iyo xafiiska Agaasimaha Guud bannaanaado sabab ay ahaataba, waxaa ku-sime noqonaya hadba kaaliyaha uu sheego xeer- nidaamiyaha Hay'adda.

QODOBKA 15AAD: MAGACAABISTA KAALIYAYAASHA AGAASIMAHA GUUD

1) Agaasimaha Guud ee Hay'addu waxa uu yeelanaayaa kaaliyeyaal, kaaliye kastana waxaa hoos tagaya agaasinno, hoggaanno, waaxyo, laamo iyo xafiisyo ku shaqo leh shaqada loo magacaabay kaaliyaha;
2) Agaasimaha Guud ayaa awood u leh inuu magacaabo kaaliyayaasha isaga oo raacaya shuruudaha ku xusan Qodobka 16aad ee Sharcigaan;
3) Agaasimaha Guud ayaa awood u leh in uu shaqada ka joojiyo ama xilka ka qaado kaaliyayaasha si waafaqsan Sharcigaan iyo xeer- hoosaadka Hay'adda;
4) Marka la magacaabayo kaaliyayaasha, agaasimayaasha, iyo guud ahaan xilalka Hay'adda ama xubno cusub oo Hay'addu qaadaneyso, waa in ay u dhacdaa si waafaqsan Sharcigaan iyo Qodobka 11aad ee Dastuurka.

QODOBKA 16AAD: SHURUUDAHA KAALIYAYAASHA AGAASIMAHA GUUD

Qofka loo magacaabayo xilka Kaaliyaha Agaasimaha Guud waa in uu soo buuxiyaa shuruudahan soo socda:

1) Waa in uu yahay xubin ka tirsan Hay'adda;
2) Waa in ayna da'diisu ka yareyn 35 sano Kana waynayn da'da hawl gabka Sida uu qabo xeerka hawl gabka;
3) Waa in uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed ah ama darajada ciidan oo u dhiganta;
4) Waa in uu leeyahay khibrad shaqo oo aan ka yareyn 5 sano oo uu ka soo shaqeeyay Hay'adda;
5) Kaaliyaasha Agaasimaha Guud waxaa si gaar ah uga reebban waxa walba oo ka reebban Agaasimaha Guud ee ku cad Qodobka 13aad ee Sharcigaan; iyo
6) Waa in uusan ku dhicin xukun maxkamadeed oo ka reebaya in uu qabto xil dowladeed;

QODOBKA 17AAD: SHURUUDAHA XUBINNIMADA HAY'ADDA

Qofkasta oo ka mid noqonaya ama ka sii mid ahaanaya Hay'adda waxaa laga rabaa in uu soo buuxiyo shuruudahan:

1) In uu yahay Soomaali Muslim ah;
2) Da'diisu u dhaxeyso 18 ilaa iyo sida Xeerka hawl gabku uu qabo;
3) Caafimaad ahaan ka soo bixi karo shaqada Hay'adda;
4) Aanan horay uga mid noqon ciidan ama sirdoon dal kale;
5) Ku tilmaaman xasillooni, garasho, iyo asluub wanaag;
6) Horay aan loogu xukumin fal dambiyeed ka dhan ah sharafta iyo ammaanada; iyo
7) In uu ka fog yahay fikirka ku saleysan xagjirnimada aaminsan rabshadaha, xiriirna la laheyn kooxaha argagixisada ah.

QODOBKA 18AAD: QAADASHADA XUBIN CUSUB

1) Qaadashada xubnaha cusub ee ka mid noqonaya Hay'adda waxaa lagu saleynayaa karti, aqoon iyo asluub wanaag;
2) Looma qaadan karo xubinnimada Hay'adda qof aan baahi shaqo loo qabin, xuquuqdiisana lagu soo darin miisaaniyadda Hay'adda ama loo haynin qaab kale oo lagu dabooli karo xuquuqdiisa; iyo
3) Qofka u shaqeynaya Hay'adda qasab ma aha in uu noqdo xubin ka tirsan Hay'adda, waxa uu noqon karaa qof kula shaqeeya heshiis ama gacansiin kaliya.

QODOBKA 19AAD: MUDDADA TIJAABADA IYO SHAQOJOOGTEYNTA

1) Qof kasta oo loo qaato in uu xubin ka noqdo Hay'adda, waxaa uu galayaa muddo saddex (3) bilood oo tijaabo ah, oo uu ku qaadanaayo tababar loogu carbinayo shaqada Hay'adda, isla markaana loo kuurgalayo heerka ku haboonaashaha qofka la magacaabay in uu ka sii mid ahaado Hay'adda, waxaana laga soo gudbinayaa warbixin joogta ah oo xaaladdiisa lagu qiimeynayo;
2) Marka ay dhammaato muddada tijaabada, Agaasimaha Guud, isaga oo wax ku dhisaya warbixinnada laga diyaariyay xubinta, waxaa u bannaan:
   (b) In uu go'aamiyo in xubinta laga dhigo xubin rasmi ah, kuna soo saaro wareegto rasmi ah meeleynteeda;
   (t) In uu soo saaro "amar fulin ka kaaftoomid ah" marka aan lagu qancin qiimeynta qofkaas;
3) Guud ahaan habraaca qaadashada xubin cusub iyo arrimaha la xariira waxaa nidaaminaya xeer-hoosaadyada Hay'adda.

QODOBKA 20AAD: DHAARTA

1) Agaasimaha Guud/Taliye, waxaa lagu hor dhaarinayaa Madaxweynaha JFS hortiisa;
2) Kaaliyayaashiisa, iyo guud ahaan saraakiisha iyo xubnaha Hay'adda marka xil loo magacaabo waxay ku hor dhaaranayaa Agaasimaha Guud/ Taliyaha sida ku cad Faqradda 2aad ee qodobkan, sidoo kale waxaa dhaartan ku dhaaranaya cid kasta oo ka mid noqoneysa Hay'adda;
3) Dhaartuna waa sidan: **"**waxaan ku dhaaranayaa magaca ILAAHAY in aan daacad u noqdo Qaranka, Dastuurka, sharcigaan iyo shuruucda kale dalka, una hoggaansamo amarrada madaxda sare, dhawrana sirta Qaranka**"**.

QODOBKA 21AAD: ANSHAXA IYO MABAAD XUBNAHA HAY'ADDA

Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda waxaa ku waajib ah:

1) In ay si hufan u gudato waajibaadka shaqo ee saaran si waafaqsan Sharcigaan, iyo dhammaan shuruucda kale ee dalka;
2) In uu si dhaga-fudeyd ku jiro ugu hoggaansamo amar kasta oo uga yimaada madaxda ka saraysa oo aanan ka hor imaaneyn Sharcigaan;
3) Dareensanaado in uu shaqo ku jiro goor walba iyo goob walba oo uu joogo iyo xaalad kasta oo uu ku sugan yahay;
4) Ilaaliyo sirta qaranka, uuna xafido amaana kasta oo qaranku leeyahay ama masuul ka yahay nooca ay ahaataba;
5) Dhowro sumcadda iyo magaca Hay'adda, kana ilaaliyo wax kasta oo sumcad-xumo u soo jiidi kara;
6) In uu naftiisa u huro ilaalinta danaha qaran ee umadda Soomaaliyeed iyo amnigeeda;
7) In uu si fiican u fahmo, kuna dhaqmo Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha, iyo xeer-hoosaadyada Hay'adda.

QODOBKA 22AAD: KU MEELAYNTA HAY'ADDA QOF AAN KA TIRSANAYN

Agaasimaha Guud waxa uu awood u leeyahay in uu qof aan ka tirsanayn Hay'adda ku meeleeyo si ku meelgaar ah, marka uu ku qanco in meeleyntiisa ay ku jirto danta shaqada Hay'adda. Qofkaas inta uu ka shaqaynayo Hay'adda waxaa uu dulsaar ku ahaanayaa miisaaniyadda Hay'adda.

QODOBKA 23AAD: MUSHAARKA, GUNNOOYINKA, DALACSIINTA & XAQSIINTA

Xeer-nidaamiyaha ayaa nidaaminaya mushaaraadka, gunnooyinka, dalacsiinta iyo guud ahaan xuquuqaha xubnaha Hay'adda.

QODOBKA 24AAD: AWOODAHA XUBNAHA

Xubinta ka tirsan Hay'adda waxa ay awood u leedahay marka loo amro ama lagu waajibiyo arimahan:-

1) Adeegsiga awood kasta oo ku cad Qodobka 8aad ee Sharcigaan;
2) Wadashada iyo isticmaalka hubka;
3) Xuuraanka, dabagalka, joojinta, fatashaadda, wareeysiga, qabashada iyo eryashada ciddi uu u arko in ay khatar ku tahay amniga, ama faldanbiyeed faraha kula jirta si waafaqsan Sharcigaan;
4) Ururinta xogaha muhimka ah iyo keydintooda, sida: maqal, muuqaal, qoraal, iyo wixii caddeyn u noqon kara fal dambiyeed faraha lagula jiro ama soo fool leh;
5) Isticmaalka magacyo, muuqaaallo, baasaboorro iyo aqoonsiyo kala duwan xilliga uu gudanayo waajibaadkiisa shaqo marka uu helo oggolaasho uu bixiyey Agaasimaha Guud/Taliyaha;
6) Cid is hortaagi karta ma jirto xubin Hay'adda ka tirsan oo waajib- gudasho Sharcigaan waafaqsan ku jirta. Hadii ay dhacdo in is hortaag lagu sameeyo shaqada, xubinta Hay'adda ka tirsan waxaa u furan in falka lagula kacay ka reebato caddeyn maqal iyo muuqaal ah, si loola xisaabtamo ciddii ku kacday.

QODOBKA 25AAD: XUQUUQDA ASAASIGA AH EE XUBNAHA

Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda waxa ay leedahay xuquuqda asaasiga ah ee hoos ku qoran iyo xuquuqdii kale ee Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha, ama xeer-hoosaadyada Hay'addu siiyaan:

1) Mushaar bille ah oo ku jaango'an darajadiisa ciidan ama rayid;
2) Gunnooyin uu ku muteysanayo hadba nooca, ahmiyadda, iyo xilka uu Hay'adda u hayo;
3) Fasax bil ah sanad walba oo ay xubintu mushaarkeeda qaadanayso, ama baddal u dhigma;
4) Daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah marka uu u baahdo;
5) Fasaxyada maalmaha ciidaha ama feestooyinka qaran ama baddal u dhigma;
6) Saacado nasasho maalinle ah oo aan ka yareeyn 8 saacadood;
7) Dallacsiin marka uu muteysto sida xeer-nidaamiyaha Hay'addu tilmaamayo;
8) In uu helo xuquuq kasta oo uu ku muteysto Sharcigaan, xeer- nidaamiyaha, xeer-hoosaadyada iyo go'aamada maamul ee madaxda Hay'adda.

QODOBKA 26AAD: MUDNAAN GAAR AH

Iyada oo la xeerinaayo dabeecadda shaqada Hay'adda, xubnaha Hay'adda, waxa ay yeelanayaan Mudnaan Gaar ah , haddii aysan fal- danbiyeed gacanta kula jirin, sida ku cad faqradaha qodobkan;

1) Lama xuuraami karo, lama dabagali karo, lama joojin karo, lama xiri karo, lama fatashi karo, lamana baari karo xubin ka tirsan Hay'adda ayada oo aan oggolaansho laga wadan Agaasimaha Guud ee Hay'adda ama qof uu wakiishay;
2) Lama baahin karo xogta khaaska ah ee xubin Hay'adda ka tirsan, sida: sawaradiisa, magaciisa, cinwaankiisa, shaqada uu Hay'adda u hayo, iyo wixi la mid ah;
3) Dacwo laguma soo oogi karo, lagumana maxkamadeyn karo xubin ka tirsan Hay'adda shaqo loo diray darteed, iyada oo aan oggolaansho laga helin Agaasimaha Guud ama

Madaxweynaha haddii cidda la maxkamdeeynayo ay tahay Agaasimaha Guud. Oggolaanshaha maxkamadeeynta xubnaha Hay'adda waa waajib in la bixiyo marka la hubsado in maxkamadeeynta la marinayo xubinta aysan wax u dhimeynin shaqada Hay'adda;

4) Dhammaan nuucyada kala duwan ee maxkamadeynta xubnaha Hay'adda waa in ay noqdaan qarsoodi si gaar ah loo qaado;
5) Agaasimaha Guud/**Taliyaha** inta uu haayo xilka waxa uu leeyahay xasaanad iyo habmaamuus la mid ah kan xubnaha Golaha Wasiirrada;
6) Marka xaqiijinta cadaaladda darteed loogu baahdo, cid aan Agaasimaha Guud aheyn ma amri karo xubnaha Hay'adda in ay bixiyaan xog sirdoon oo ay hayaan;
7) Qofna kuma cadaadin karo Hay'adda iyo xubnaheeda in uu ka helo xogo sirdoon oo ay hayaan isaga oo cuskanaya xaqqa helitaanka xogta ee uu tilmaamay Dastuurka;
8) Guud ahaan habmaamuuska xubnaha Hay'adda waxaa nidaaminaya xeer-hoosaad oo uu soo saarayo Agaasimaha Guud.

QODOBKA 27AAD: CIIDANKA LABBISAN EE HAY'ADDA

1) Hay'addu waxa ay yeelaneysaa ciidamo gaar ah oo labbisan ama aan labbisneyn oo fuliya howlgallada amni ee Hay'adda shaqadeeda xiriirka la leh;
2) Guud ahaan, ciidammada labbisan ee Hay'adda waxa ay noqonayaan kuwo tiradoodu kooban tahay, kuna xirantahay hadba baahida amni ee jirta;
3) Waajibaadka ay leeyihiin ciidammada labisan ee Hay'addu waxa ay ku kooban yihiin oo kaliya:
    (b) Fulinta howlgalada gaarka ah ee Hay'adda;
    (t) Sugidda amniga xarumaha Hay'adda iyo fadhiyadeeda;
    (j) Sugidda amniga masuuliyiinta Hay'adda iyo kuwa kale ee loo garto;
    (x) Sugidda amniga martida qaranka;
    (kh) Sugidda amniga goobaha xasaasiga u ah dowladda iyo baraha qarsoon;
    (d) Kaalmeynta qeybaha kala duwan ee ciidanka qalabka sida iyo hay'adaha amniga marka loo baahdo, si aan wax u dhimeynin waajibaadkooda gaarka ah;
    (r) Waajibaadyada gaarka ah ee Agaasimaha Guud u xil saaro si waafaqsan qodobka 12-aad ee Sharcigaan;
4) Darajooyinka iyo dallacsiinta guud ahaan xubnahaHay'addaeeciidan ama rayid ah waxaa nidaaminaaya xeer-nidaamiyaha Hay'adda.

QODOBKA 28AAD: SHAQA KA JOOJIN, KEYD GALIN, DARAJO DHIMIS IYO SHAQO KA SAARID

1) Shaqo ka joojin, waxaa loola jeedaa ka reebid laga reebo xubin ama qof Hay'adda u shaqeynayay gudashada waajibaadkii uu u xilsaarnaa, waxaana sameyn kara Agaasimaha Guud/Taliyaha, Kaaliye Agaasime Guud, Agaasime, iyo Masuul howl uu u madaxbannaan yahay u sarreeyo oo kaliya. Habraaca xubin ama qof Hay'adda u shaqeeyo shaqo ka joojin loogu sameynayo waxaa lagu faah-faahin doonaa xeer-hoosaadka Hay'adda;

2) Shaqo ka saarid, waxaa loola jeedaa in la baabi'iyo xubinnimada qof uu ku dhex lahaa Hay'adda iyada oo si dhameystiran looga saarayo diiwaanka guud ee Hay'adda. Shaqa ka saarid waxaa sameyn kara oo kaliya Agaasimaha Guud/Taliyaha isaga oo fulinaayo amar ama xukun maxkamadeed dhaqangal ah ama xeerinaayo xaalad kasoo baxday Sharcigaan ama xeer-nidaamiye waajibiyay in qofka shaqada laga saaro;

3) Darajo Dhimis, waxaa loo la jeedaa in hoos loo dhigo ama la baabi'iyo darajo xubin rayid ah ama garaado xubin ciidan ah oo Hay'adda ka tirsan. Darajo dhimis waxa ay ku dhacdaa oo kaliya xukun maxkamadeed oo kama dambeys ah, waxa uuna dhaqangal ku noqonayaa xeer Madaxweyne.

QODOBKA 29AAD: WAAYIDDA XUBINNIMADA

Xubinnimada Hay'adda waxaa lagu weynayaa xaaladaha soo socda mid kamid ah:

1) Buuxsamidda sanadka howlgabka si waa faqasan xeerka hawl gabka;
2) Aqbalaadda is casilaad xubintu soo gudbiso;
3) Qabashada xil dastuuri ah, ama shaqo kale oo dowladeed oo ka madax-bannaan shaqada Hay'adda meeleynna aan aheyn;
4) Waayista shardi ka mid ah shuruudaha xubinnimada sida ku cad Qodobka 18aad ee Sharcigaan;
5) U wareegista talis ciidan ama hay'ad dowladeed ee kale si dhammeystiran; iyo
6) Geeri ku timaadda xubinta.

QODOBKA 30AAD: XAQA DACWADDA IYO EED-SHEEGASHADA XUBNAHA

Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda ama heshiis kula shaqeysay waxaa u bannaan in ay dacwo ama cabasho ka gudbiso cid kasta oo ku xadgudubta xuquuqdeeda, karaamadeeda, iyo amnigeeda; habraaca eed-sheegashada waxaa qeexayo xeer-nidaamiyaha Hay'adda.

QODOBKA 31AAD: ARRIMAHA KA REEBBAN XUBNAHA HAY'ADDA

1) Dhammaan xubnaha Hay'adda, haddii aysan helin oggolaansho, waxaa ka reebban Sharcigaanna uu ka xadidayaa xuquuqaha iyo xorriyaadka la xiriiro:
   (b) Qaadashada dhalasho dal shisheeye isagoo gudanaayo waajibaadkiisa shaqo ee hay'adda;
   (t) Bixinta wareysiyo warbaahineed, faaqidaad iyo falanqeyn ku saabsan xaalado siyaasadeed, iyo faafinta qormooyin xambaarsan aragti siyaasadeed;
   (j) ururinta kaalmo- wadareed dhaqaale oo lagu taageerayo ujeeddo siyaasadeed.
2) Waxaa kale oo ka Reebban Guud ahaan Xubnaha Hay'adda:
   (b) Ka mid ahaanshaha urur, xisbi, iyo koox siyaasadeed ama diimeed gaar ah;
   (t) Fulinta amarro liddi ku ah qarannimada, Dastuurka, nabadgalyada, iyo shuruucda dalka.
   (j) Xubintu waxa ay xaq u leedahay in ay madaxdeeda ka codsato amar qoraal ah marka ay u aragto in ay lama huraan tahay in qoraal lagu caddeeyo;
   (x) Adeegsiga noocyada kala duwan ee maandooriyaha;
   (kh) Gabbaad-siinta tuhmane ama danbiile sharcigu ku raad joogo;
   (d) In uu ka qariyo khataraha amni ee uu xogaheeda helo cidda ay tahay shaqa ahaan in uu gaarsiiyo;
   (r) Ka qeyb-qaadashada mudaaharaadyada, cabasho wadareedka iyo sameynta shaqo-joojin cabasho ku saleysan;
   (s) Sameynta xiriirro aan idmaneyn oo uu la yeesho jiho shisheeye ah ama cadaw ah.

QODOBKA 32AAD: MAXKAMADAYNTA XUBNAHA HAY'ADDA

Xubin ka tirsan Hay'adda ama la shaqeysa marka ay gasho fal-danbiyeed la xiriira shaqada Hay'adda waxaa lagu xukumayaa Xeerka Ciqaabta Ciidamada, waxaana lala tiigsanyaa

maxkamadda ciidamada gal- danbiyeedkiisa iyo dacwad qaadistiisuba waxa ay noqonayaan mid qarsoodi ah.

QODOBKA 33AAD:ANSHAX-MARINTA XUBNAHA

1) Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda oo gasha fal liddi ku ah waxna u dhimaya anshaxa iyo dhaqanka ciidannimo waxaa loo cuskanayaa Xeerka Anshaxa Hay'adda;
2) Hay'addu waxey yeelaneysaa Xeerka Anshaxa iyo Guddiga Anshax- marinta.

CUTUBKA 5AAD: CODSIGA BIXINTA WAARAN

QODOBKA 34AAD: CODSIGA HAY'ADDA EE HELIDDA WAARAN

1) Marka ay Hay'addu u baahato waaran garsoor si ay u gudato waajibaadkeeda; codsiga ay Hay'addu sameyneyso waxaa soo saaraya Agaasimaha Guud/Taliyaha ama cidda uga masuulka ah howlaha barista;
2) Codsiga khuseeya Faqradda (1) waa mid haldhinacle ah, Hay'adda keliya ayaana geyn karta iyada oo aan loo baahnayn in dhanka kale la dhagaysto;
3) Waaranka ay Hay'addu ugu baahan tahay ka hortagga iyo ka dabatagga danbiyada shaqadeeda xiriirka la leh waxaa bixinaya oo ay waydiisaneysaa Maxkamadda ikhtisaaska u leh;
4) Hay'addu waxa ay waaran Maxkamadeed ugu baahan tahay:
   (b) Marka qof ay soo qabatay oggolaansho sii hayn iyo baaris tuhmane ugu baahato si baaris dhammeystiran loogu sameeyo;
   (t) Marka ay Hay'addu sameyneyso howlgal oo saameyn taban ku yeelan kara nafta, sharafta iyo hantida qofka, danaha qaranka, amniga gobolka iyo caalmka oo ay Hay'addu u baahan tahay oggolaansho fulin;
   (j) Marka qofka ay Hay`addu tallaabada ka qaadeyso asal ahaan aan waaranka u baahneyn uu yahay qof leh Xasaanad sharci ah.
5) Waaranka ay Hay'addu qaadato kuma qasbana in ay la wadaagto cidda ay tallaabada ka qaadeyso, gaar ahaan marka laga dheehan karo qoraalka waaranka xogo sir qaran ah;
6) Muddada uu dhaqangal ahaan karo waaran ay Hay'addu qaadatay kama badnaan karo 30 cisho, inta jeer ee Hay'adda waaranka loo cusbooneysiin karana waxaa go'aaminaya garsoorka ku shaqada leh, iyada oo la tixgalinaayo soojeedinta Hay'adda.
7) Markii, garsoorku ku qanci waayo codsiga waaranka ee Hay`adda, garsoorka waxaa u furan in uu soo saaro amar fasixid ah ama horgeyn maxkamadeed waqti cayiman leh.

QODOBKA 35AAD: BIXINTA WAARAN

Jihada garsoor ee Hay'addu u gudbisatay codsiga waaranka, marka ay ku qanacdo sharcinimada waranka, hey'adda waxay xaq uleedahay in la siiyo waaranka.

QODOBKA 36AAD: XAALAD DEG DEG AH

Haddii ay jirto xaalad gaar ah, oo falcelin degdeg ah u baahan, Agaasimaha Guud/Taliyaha ama cidda uu wakiishay waxa uu awood u leeyahay in uu qaado tallaabo waajib-gudasho ah iyada oo aan la helin waaran haddii la codsaday iyo haddii kaleba. Waase in Hay'addu warbixin maangal ah si deg deg ah ku soo gaarsiisaa ciddi ay aheyd in ay waaran ka qaadato muddo 24 saac gudahood ah, warbixintuna waa in ay noqotaa mid caddeyneysa waxa xaaladda deg deg ka dhigay oo waaranka loo sugi waayay, tallaabooyinka ay Hay'addu qaadday, waxa ka dhashay iyo cidda ay saameysay.

QODOBKA 37AAD: XUQUUQDA DADKA HAY'ADDU HAYSO

1) Qof kasta oo ay qabato ama ay hayso Hay'addu oo la hayay muddo ka badan 48 saac waxa uu xaq u yeelanayaa:
2) In uu la xiriiro ehelkiisa iyo ciddii shaqo sharci ahi kala dhaxeeyso si aan wax dhib ah u geysaneyn baarista;
3) In uu la xiriiro garyaqaanadiisa, dhakhtarkiisa, iyo ciddii kale oo uu xiriir muhim ah uga baahdo si aan wax dhib ah u geysaneyn baarista.
4) Lama jirdili karo, lamana maskax iyo mooral dili karo qof kasta oo gacanta Hay'adda ku jira;
5) Waxaa u furan qofka Hay'adda gacanteeda ku jiro in uu helo cunto, cabitaan, dawo, dhar, buugaag uu akhristo iyo wixi kale ee la mid ah oo ka duwan inta maxaabiista loogu tala galay isagoo jeebkiisa isticmaalayo;
6) Dadka ku jira gacanta Hay'adda ee dumarka ah waxaa lagu haynayaa goob ilaalo hoosaad dumar ah leh, waxaana loola dhaqmayaa si waafaqsan shareecada islaamka iyo dhaqanka suuban;
7) Ehelada qofka ku jira gacanta Hay'adda waxaa u furan in ay soo booqdaan qofka xanniban xaaladiisana ay la socdaan waqtiyada loo cayimo;
8) Goobta lagu haynayo qofka ku jira gacanta Hay'adda waa in ay ahaato meel ku haboon in lagu haayo qof bani'aadan ah, lehna adeegyada lama huraanka u ah nolosha iyo fayadhowrka;
9) Wakiilka xeer-ilaalinta ee ku qoran xarumaha baarista ee Hay'adda waxa uu si joogta ah ula soconayaa xaaladaha dadka ku jiro gacanta Hay'adda si uu u hubsado in ay helaan xuquuqdooda oo dhammeystiran;
10) In sida ugu dhaqsiyaha badan loo sii daayo marka uu soo baxo xukun ama amar garsoor oo farya in xorriyadiisa dib loo siiyo, ama ay Hay'addu ka salgaarto kiiskiisa inta aan garsoor loo gudbin;
11) Habka loola dhaqmayo dadka ku eedeysan ama lagu tuhmayo kiisaska xiriirka la leh argagixisda iyo baasaasidda, waxaa nidaamin doono Sharciga La dagaalanka Argagixisada, iyo sharcigi kale ee arrimahaas khuseeya.

QODOBKA 38AAD: BAARISTA IYO HUBINTA

1) Guud ahaan habraaca baarista iyo hubinta ay Hay'addu sameyso waxaa faahfaahinaya xeer-hoosaadka Hay'adda;
2) Caddeymaha danabeysan ama daabacan sida muuqaallada, sawirrada, codadka, qoraallada, tixraacyada xiriirka la leh tiknoolajiyada iyo wixi la mid ah, marka ay Hay'ddu tahay cidda hubin dhammeystiran ku sameysay isla markaana xaqiijisay in ay khuseeyaan kiiska ay gacanta ku hayso; caddeymaha noocaas ah garsoorku waa in uu u tixgaliyaa in ay yihiin caddeymo go'aan garsoor lagu qaadan karo oo dhaqangal ah.

QODOBKA 39AAD: JIRDIL IYO XADGUDUB

Waxaa ka mamnuuc ah xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda ama u shaqeysa in ay qof kula kacdo jirdil, ficil naxariis darro ah ama bani'aadanimada ka baxsan.

QODOBKA 40AAD: SHEEGASHADA XUBINNIMADA HAY'ADDA IYO MATALAAD BEEN ABUUR AH

Waxaa reeban, iyada oon oggolaansho qoraal ah laga haysan Agaasimaha Guud/Taliyaha, ama aan shaqo ahaan loogu idmaneyn; in la isticmaalaan magac, tilmaan, cinwaan ama calaamad laga yaabo in ay qofka kale ku hoggaamiso in uu rumaysto in shaqada loo qabanayo si Sharcigaan waafaqsan ama uu Hay'adda ka socdo.

QODOBKA 41AAD: IS HORTAAGGA SHAQADA HAY'ADDA

Waxaa reeban, is-hortaag ku sameynta ama carqaladeynta shaqo sharci ah oo Hay'adda loo hayo oo ay ogtahay cidda falkaas ku kacaysa ama lagu wargaliyay.

QODOBKA 42AAD: SHAACINTA XOG AAN LA FASAXIN

1) Qof kasta oo xubin ka ah Hay`adda, waxaa ka reeban in uu shaaca ka qaado xog uu ku helay u shaqaynta Hay'adda, asaga oo aan oggolaasho ka haysan Agaasimaha Guud/Taliyaha
2) Faqrada kowaad (1) ee qodobkan, waxa kale oo ay khuseysaa marka xubinta ama masuulku shaqada ka tago ama meeleyntii Hay'adda ka dhamaato, ama uu dhamaado heshiiskii shaqo ee Hay'adda kala dhexeeyay;
3) Qof walba (aan ka tirsaneyn Hay'adda) waxaa ka reeban faafinta xog u gaar ah Hay'adda, xubin Hay'adda ka tirsan ama cid ay shaqo kala dhaxeyso Hay'adda.

QODOBKA 43AAD: BAABI'INTA XIRIIRRO IYO XOGO SIRDOON

1) Qof walba oo u shaqeeya Hay'adda oo haya xiriir sirdoon oo lagu ogyahay, kalana dhaxeeyo xubin, ila-wareed, adeege, ama jiha kale oo ay Hay'addu la leedahay xiriir ama iskaashi sirdoon, waxaa ka reebban in uu maareynta xiriirkaas u adeegsado aalad warqabad, isgaarsiin ama xog keydin aysan Hay'addu laheyn;
2) Xubin walba ama qof walba waxaa ka reeban in uu baabi'iyo ama uu wax ka badelo xog sirdoon oo uu hayey, ama lagu keydiyay qalab, aalad ama cinwaan uu ku shaqeynayay ama u gacan galay oo ay Hay'ddu leedahay ama uu kharribaad ama dayacaad u geysto qalabkii ama cinwaankii uu ku shaqeynayay ama u gacan galay ama uu diido in uu si buuxda u soo wareejiyo markii la faray ama xilkiisi uu dhammaaday.
3) Dhammaanqalabkaiyoaaladahalooadeegsadomaareyntaxogaha iyo xiriirada sirdoonka waxa ay yeelanayaan diiwaan gaar ah, habraaca lagu maareynayana waxaa tilmaamayo xeer-hoosaad;
4) Agaasimaha Guud/Taliyaha ee Xilka ka dagayo waxaa waajib gaar ah ka saaran yahay, marka uu xilka wareejinayo, in si gaar ah Agaasimaha Guud/Taliyaha ee cusub ugu wareejiyo diiwaanka guud ee adeegayaasha iyo Ila- wareedyada Hay'adda oo dhammeystiran

CUTUBKA 6AAD: MAALIYADDA HAY'ADDA

QODOBKA 44AAD: MIISAANIYADDA HAY'ADDA

1) Hay'adda waxa ay yeelaneysaa miisaaniyad sanadeed ku jaan go'an qorshe sanadeedkeeda, waxaana soo diyaarinaya Agaasimaha Guud/Taliyaha, ayada oo lagu fariisinayo halbeeg cilmiyeed sax ah, waxaana lagu darayaa miisaaniyadda guud ee Qaranka.
2) Madaxyada miisaaniyadda Hay'adda la iskuma dhex furi karo, waxaana loo fulinayaa sida loo qorsheeyay hadeysan soo kordhin baahi maangal ah oo qoraal lagu caddeynayo;

3) Guud ahaan miisaaniyadda iyo maaliydda Hay'adda waxaa nidaaminaya xeer-hoosaad uu soo saarayo Agaasimaha Hay'adda, si waafaqsan xeerka maaliyadda guud ee dalka;
4) Qoondada miisaaniyadda barnaamijyada qaran ee ku mataanaysan Hay'adda waxaa si toos ah loogu shubayaa xisaabaha gaarka ah ee barnaamijyadaas, waxaana si toos ah u maamulayo hadba agaasimaha masuulka ka ah.

QODOBKA 45AAD: XISAABAADKA IYO HANTIDHOWRKA

Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka ayaa u xilsaaran in uu faafreeb iyo dabagal ku sameeyo miisaaniyadda Hay'adda iyo sida loo isticmaalay, waxaase sir u ahaanayo Hay'adda oo aanan dabagal iyo tixraac midna lagu samayn karin madaxa-miisaaniyadeedka laga maareeyo howlaha sirdoonka, waxa uuna noqonayaa xisaab furan oo uu si toos ah u maamulo Agaasimaha Guud ama ciddi uu u xil saaro ee sirdoonka ku shaqo leh.

QODOBKA 46AAD: DHAQAALAHA HAY'ADDA

Hay'addu waxa ay yeelan kartaa mashaariic maalgalineed ganacsi ah, iyo in ay bixiso adeegyo kala duwan oo ay ka heleyso dakhli dheeri ah oo ay u kaashato howlaheeda si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda (PFM)

CUTUBKA 7AAD: QODOBBO QUBANE AH

QODOBKA 47AAD: KAALINTA WASAARADDA AMNIGA GUDAHA EE KU AADAN HAY`ADDA

1) Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka, waxa ay Hay`adda ku yeelanaysaa kaalinta hoos ku xusan:
2) Waxa ay Hay`adda ku matalaysaa fagaaraha siyaasadda guud ahaan iyo Golaha wasiirada gaar ahaan;
3) korjoogteyn howlaha Hay`adda iyo hubinta in ay waafaqsan yihiin siyaasadda amniga Qaranka iyo qorshaha guud ee Xukuumadda;
4) Qorshaha sanadlaha ah ee Hay`adda, waxa uu qayb ka yahay qorshaha guud ee Wasaaradda, waxaana lagu meel marinayaa Golaha wasiirada;
5) Xiriirada maamul ee Hay`addu la yeelanayso Wasaaradaha kala duwan ee dowladda, waxa ay marayaan Wasaaradda oo ku lifaaqaysa qoraal gudbin ah, si waafaqsan xiriirada maamul ee rasmiga ah;

QODOBKA 48AAD: WAAJIBNIMADA LA SHAQAYNTA HAY'ADDA

Dhamaan muwaadiniinta iyo ajaanibta ku sugan dalka gudahiisa, ama ka tirsan laamaha iyo heerarka kala duwan ee dowladda, waxaa waajib ku ah in ay Hay'adda ku gacansiiyaan shaqada qaran ee ay hayso, ilaaliyaanna sirnimada shaqada ay Hay'adda la hayaan, kuna howlgalaan hadba tilmaamaha ay Hay'addu bixiso ee la xiriira wada shaqeynta iyo gacansiinta Hay'adda, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

QODOBKA 49AAD: MAMNUUCIDDA XABSIYO QARSOODI AH

Hay'addu ma yeelan karto xabsiyo qarsoodi ah, laakiin waxaa u furan in ay yeelato xarumo baaris oo la yaqaan, oo ay ku hayso dadka la soo qabto inta ay baaristu ku socoto oo keli ah.

QODOBKA 50AAD: BAABI'IN

Waxaa la baabi'yey Xeer lr.14 ee Febraayo 1970 iyo Sharci kasto ee ka hor imaanayo.

QODOBKA 51AAD: DHAQAN-GALKA SHARCIGAAN

Sharcigaan waxa uu dhaqan galayaa, marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

SHARCI LR.004
ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA CUNAQABATAYNTA MAALIYADEED EE CAYIMAN

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH//B11/23**, ku taariikheysan **28/02/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Ansixinta Hindise Sharciyeedka Cunaqabataynta Maaliyeed ee Cayiman.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Muqdisho, 08 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-027-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE SHARCIYEEDKA CUNAQABATAYNTA MAALIYADEED EE CAYIMAN

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
17 JAN 2023
SOO GELIDIRECEIVED

HORDHAC

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaa ka go'an sidii ay u sugi lahayd bad-qabka dadkeeda iyo hantida dalka, iyadoo ujeeddadu tahay sidii looga hortagi lahaa khataraha ka dhanka ah Muwaadiniinta iyo Shirkadaha Soomaaliyeed, gaar ahaana maalgelinta argagixisada. Iyadoo maanka lagu hayo taas, isla markaana la tixgelinayo go'aammada Qaramada Midoobay ee aan xubinta ka nahay, ayay Dowladdu go'aansatay inay dejiso Sharci iyo Xeerarkii looga baahnaa si loo dhaqan-geliyo istiraatijiyadda lagu ciribtirayo maalgelinta argagixisada, walibana lagu hirgelin karo go'aammada Qaramada Midoobay ee khuseeya Cunaqabataynta Cayiman ee Maaliyadeed.

Sharcigaan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa ka dhalan doono ayaa Dowladda Soomaaliya siin doona dariiqa sharciga ah ee loo marayo marka lagu sameynayo asteyn shirkado ama shakhsiyaad si cunaqabatayn loogu soo rogo.

Intaa waxaa dheer, Sharcigan wuxuu awood u siinayaa Dowladda inay si buuxda u fuliso waajibaadkeeda kaga aaddan go'aammada la xiriira cunaqataynta oo ay soo saarto Qaramada Midoobay. Go'aammadan oo ay soo saaraan Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ayaa waxaa ka mid ah kuwo looga dan leeyahay in lagu soo rogo cunaqabatayn ka dhan ah shakhsiyaad iyo shirkado cayiman, kuwaas oo ay Qaramada Midoobay u aragto inay ku xad-gudbeen shuruucda caalamiga ah, sidaas darteedna ay khatar ku yihiin nabadda iyo ammaanka caalamka.

CUTUBKA 1-AAD:
MAGACA, UJEEDDADA IYO QEEXITAANNADA

Qodobka 1aad:
Magaca iyo Baaxadda Sharciga

1. Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman.
2. Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa dadka lagu tuhmo maalgelinta argagixisada oo kaliya.

Qodobka 2aad:
Ujeeddada

1. Ujeedka Sharcigan ayaa ah in Soomaaliya yeelato nidaamyo cunaqabatayn maaliyadeed oo adag oo u oggolaanaya inay hirgeliso cunaqabataynta gudaha, walibana ay fuliso iyadoo tixgelinaysa xubinnimadeed Qaramada Midoobay go'aannada Golaha Ammaanka ee la xiriira nidaamka cunaqabataynta ee ku aaddan cunaqabataynta iyo la dagaallanka maalgelinta argagixisada.
2. Sharcigani waxa uu dhigayaa habraacyada looga baahanyahay inay u-hoggaansamaan hay'adaha maamulka iyo kuwa kormeerka markii ay u asteynayaan hay'ad ama shaqsi cunaqabatayn maaliyadeed ee cayiman, ku darista ama ka saarista Liiska Shakhsiyaadka La-asteeyay, iyo xayiraad kala noqoshada hanti ama lacag horay loo xayiray.
3. Sharcigani waxa kale oo uu dejinayaa habraaca cabashada ee ka dhanka ah tillaabooyinka lagu xusay farqada 3aad.

Qodobka 3aad:
Qeexitaannada

1. Haddii aan si kale loogu qeexin sharcigan gudihiisa, ereyadan soo socdaa waxay yeelanayaan macnaha soo socda:

a. "Shakhsiyaadka la asteeyay" waxaa loola jeedaa shaqsiyaad la asteeyay iyadoo la raacayo habraaca uu dhigayo Sharcigan iyo xeer-nidaamiyaashiisa taaso u oggolaanaysa Guddiga inuu u asteeyo shakhsiyaad sababo cunaqabatayn maaliyadeed darteed ama dadka lagu asteeysay Qaraarka Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay. Shakhsiyaadkaan waxaa ka mid ah (marka laga soo tago shakhsi iyo hay'add shaqsiyad qaanuuned leh), urur kasta ama isu-tag shaqsiyaad.

b. "Liiska Shakhsiyaadka La-asteeyay" waxaa loola jeedaa liis ay soo diyaariyeen guddiga qaran ee ka hortaga lacag dhiqida iyo maalgelinta argagixisada, oo ay ku qoran yihiin magacyada hay'adaha iyo shakhsiyaadka loo asteeyay si waafaqsan Sharcigan.

c. "Qaraarada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay" waxaa loola jeedaa qaraar uu ansixiyay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee la xiriira maalgelinta argagixisada.

d. "Wasaarad" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

e. "Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

f. "Guddiga" waxaa loola jeeda Guddiga Qaran ee la Dagaalanka ka hortaga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagaxisada. Wuxuuna ka kooban yahay; Wasiirka Maaliyadda oo noqonaya Guddoomiye, Wasiirka Cadaaladda, Xeer Illaaliyaha Guud, Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha, Wasiirka Amniga Qaranka, Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka Qaranka, iyo Agaasimaha Xarrunta Warbixinnada Maaliyadda oo ah Xoghayaha Guddiga.

g. "Hay'adaha Kormeerka" waxaa loola jeedaa Booliiska, Xarunta Warbixinta Maaliyadda (FRC), Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka iyo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

h. "Xayiraad" waxaa loola jeedaa ku soo rogidda xayiraad hanti ama lacag si looga hortago in la isticmaalo. Isticmaal lacag ama hanti waxaa loola jeeda marka la wareejiyo, la sarifo, la iibsho ama la raro.

2. Eray kasta oo kale oo ka dhex muuqda Sharcigan iyo Xeerkasta oo lagu soo saaray si waafaqsan Sharcigan ee lagu qeexay Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda Iyo Maalgelinta Argagixisada, ee 2016 wuxuu lahaanaya macnaha lagu sheegay Sharcigaas.

Qodobka 4aad:
Dembiga Maalgelin Argagixiso

1. Sida ku qeexan Qodobka 3aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda Iyo Maalgelinta Argagixisada, ee 2016, qof wuxuu galay "dembiga maalgelin argagixiso" haddii, isagoo adeegsanaya hannaan kasta, ha ahaato si toos ah ama si dadban, ugu deeqo ama u uruuriya dhaqaale, ama isku daya sameynta labadaas arrimood, iyada oo ujeeddadu tahay in loo isticmaalo ama ogyahay in loo isticmaalayo guud ahaan ama qayb ahaan ujeeddooyinka hoos ku xusan:
   a. Si loogu fuliyo fal argagixiso; ama
   b. Si loogu taageero Shakhsi Argagixiso ah; ama
   c. Si loogu taageero urur argagixiso; ama
   d. Maalgelin safar dagaalyahan argagaxiso oo ajnebi ah.
2. Dembiga ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan waa lagalay:
   a. Xataa haddii falka argagixiso aanu dhicin ama aan la isku dayin;
   b. Xataa haddii dhaqaalaha aan loo isticmaalin in lagu galo ama la isku dayo fal argagixiso;
   c. Iyada oo aan la eegayn dalka ama dhulka falka argagixiso loogu talo galay inuu ka dhaco.
3. Waxaa dembi ah:

a. In laga qayb qaato iyada oo gacan siin ah dembi ku xusan faqradda (2);
b. In la abaabulo ama lagu hago cid kale inay galaan dembi ku xusan faqradda (2); ama
c. In si ku talogal ah loogu qaaraan darsado si ay u galaan dembiga ku xusan farqada (2) koox dad ah oo leh, ujeeddo guud marka qaaraankaas loo sameeyo si loo sii kordhiyo dembi ku xusan faqradda (2) ama qaaraanka la sameeyey iyada oo la og yahay in kooxdu ay gelayso dembi ku xusan farqada (2).

CUTUBKA 2-AAD:
XAYIRAADA MAALIYADDA, ASTEEYNTA SHAKHSIYAADKA IYO DIB U EEGISTA ASTEYNTA

Qodobka 5aad:
Waajibaadka Macluumaad Bixinta Sababo Asteeyn Darteed Iyo Awoodaha Hay'adaha Kormeerka

1. Guddiga Qaran ee la Dagaalanka Lacag Dhaqidda iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada iyo Hay'adaha Kormeerka, kuna hawlan shaqada aqoonsiga iyo asteynta ee ku xusan Qododbka 6, waxa ay awood u leeyihiin inay hay'adaha iyo shakhsiyaadka oo dhan ka dalbadaan in ay soo gudbiyaan macluumaadka iyo dukumentiyada gacan ka gaysan kara aqoonsiga iyo asteeynta shakhsiyaadka iyo hay'addaha. Marka aan loo soo gudbin macluumaadka ay rabaan, Hay'adaha ku hawlan shaqada aqoonsiga iyo asteynta waxay raadsanayaan caddeymaha ay u baahanyihiin iyagoo u hoggaansamaya Qodobada Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed ee hagga caddeymaha iyo uruurintooda.
2. Dhammaan Hay'addaha Warbixinnada (Reporting Entities) ee lagu sheegay Qodobka 4-aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda Iyo Maalgelinta Argagixisada, waa inay si degdeg ah ugu wargeliyaan Guddiga iyo Hay'adaha Kormeerka, dhammaan macluumaadka la xiriira macaamilaadka maaliyadeed oo dhan haddii ay ka shakiyaan ama ay haystaan sabab macquul ah oo ay uga shakiyaan in macaamilkaas maaliyadeed, ama isku-daygaas macaamilkaas maaliyadeed uu xariir la leeyahay dhaqaale xiriir laleh, loo isticmaalaay ama loo isticmaalaayo ama lagu taageerayo argagixiso, falal argagixiso ah ama ururo argagixiso ah.

Qodobka 6aad:
Aqoonsiga iyo Asteeynta Shaqsiyaadka

1. Guddiga Qaran ee la Dagaalanka Lacag Dhaqidda iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada ayaa mas'uul ka ah usoo jeedinta Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay inay asteyaan shakhsiyaad iyo bixinta caddaynta ku filan asteynta ay soo jeediyeen, iyada oo loo marayo nidaamka diblomaasiyadeed ee u degsan Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah. Si loo fuliyo hannaanka aqoonsiga iyo asteynta, waxaa la dejinayaa xeer-nidaamiyo lagu hagaayo habka lagu aqoonsanayo dadka la asteynaayo iyadoo lagu salaynayo shuruuddo la cayimay.
2. Marka ay jiraan sababo maangal ah oo saldhig u noqonkara asteynta shakhsiyaad ama hay'ad, Guddiga Qaran ee la Dagaalanka Lacag Dhaqidda iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada waa inay go'aankooda ku gaaraan Seddex Meelood Labo (2/3) shaqsiga ama hay'adda soo buuxisay shuruudaha la cayimay, waxayna u idmanyahiin inay si degdeg ah oo wax ku ool ah baaritaan u sameeyaan, go'aana kaga gaaraan muddo bil ah asteynta. Waxay sidoo kale ka codsanayaan wadamada kale inay asteeyaan ama ay dhaqan galiyaan asteynta gudaha dalka laga sameeyay kadib markii ay maxkamada sare go'aan kama dambeysa ah ka gaarto asteynta ama muddada racafaanka ay ka dhammaato shaqsiga ama hay'adda.

3. Marka qof ama hay'ad uu asteeyo Guddiga ama Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, waa in isla markiiba la xayiraa lacagta ama hantida shakhsiga iyo hay'adda la asteeyay.
4. Waa in si degdeg ah lagu ogeysiiya qofka ama shirkadda la asteeyay:
   a. Asteynta lagu sameeyay iyo saameynta ay leedahay; iyo
   b. Fursada dib-u-eegista ka furan asteynta lagu sameeyay iyo cidda ay kala xiriirayaan.
5. Xeer-nidaamiye kasta oo khuseeya dhaqangelinta asteynta waa in loo dhaqan-geliyaa si waafaqsan Sharcigan iyo Axdiyada Caalamiga ah oo ay Soomaaliya qayb ka tahay.

Qodobka 7aad:
Xayiraada Lacagta iyo Hantida

1. Iyadoo loo hoggaansamayo Qodobka 6-aad ee Sharcigan ee khuseeya asteynta shakhsiyaadka;
   c. Dhammaan shakhsiyaadka ama hay'adaha, oo ay ku jiraan Hay'addaha Warbixinnada (Reporting Entities), waa inay si degdeg ah u xayiraan lacagta iyo hantida shakhsiyaadka la asteeyay iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 6-aad ee Sharcigan;
   d. Dhammaan shakhsiyaadka jooga iyo hay'addaha kuyaala gudaha dalka Soomaaliya iyo muwadiniinta Soomaaliya waxaa ka mamnuuc ah in ay u oggolaadaan hanti ama lacag ama adeegyada kale ee la xiriira maaliyadda, si toos ah iyo si dadbanba, shakhsiyaad ama hay'addo la asteeyay, iyo waliba shirkadaha ay leeyihiin ama ay xukumaan dadka la asteeyay, si toos ah iyo si dadbanba. Waxaa kaloo mamnuuc ah in ay u oggolaadaan shakhsiyaadka matalayaa, hantida, lacagta ama adeegyada kale ee la xiriira maaliyadda oo ay leeyihiin shakhsiyaadka la asteeyay.
   e. Tallaabada ku xusan Farqadda 1(b) ee Qodobkan waa in lagu dabaqo lacagta ama hantida lagu qeexay Sharciga Ka Hortaga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada, 2016.
2. Waxaa lasoo saaraya xeer-nidaamiye caddeynayaa habraaca xayiraadda hantida iyo lacagaha shakhsiyaadka iyo hay'addaha la asteeyay. Xeer-nidaamiyahaan waa in loo dhaqangeliya si waafaqsan Sharcigan iyo heshiisyada caalamiga ah oo ay Soomaaliya qaybta ka tahay.

Qodobka 8aad:
Xaqa Iyo Habka Codsashada Ka Dhanka Ah Asteyn Lasameeyay

1. Xilli kasta oo asteyn la sameeyay ay wali dhaqan gal tahay, shaqsiga ama hay'adda la asteeyay:
   a. Waxa uu ka codsan karaan Guddiga Qaran ee la Dagaalanka Lacag Dhaqidda iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada inay is beddel ku sameeyaan astenyta, ama;
   b. Inay ka noqdaan asteynta.
2. Haddii codsi ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan oo la xiriira asteyn lasameeyay lasoo gudbisto, codsi kale lagama soo daba gudbin karo haddii uusan is-beddel ku imaan sababihii loo adeegsaday codsigii hore ama ay jirto arrin muhiim ah oo aan Guddigu hore u tixgelin.
3. Codsiga ku xusan Qodobkan marka lasoo gudbiyo, Guddiga waa inuu go'aan ka gaara in wax laga beddelayo ama laga noqonaayo asteynta ama wax is-beddel ah aan lagu sameyncyn muddo bil ah.
4. Haddii ay Guddiga Qaran ee la Dagaalanka Lacag Dhaqidda iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada ay iskood ugu cadaato, ama codsi uu uga yimaado shakhsi ama hay'adda la asteeyay, kuna saabsan in shuruudihii looga baahnaa asteeynta shaqsigaas ama hay'addaas aan la buuxin, Guddigu waa inuu u gudbiyaa codsi ka saaris liiska asteeynta guddiga cunaqabataynta Qaramada Midoobay ee ku shaqada leh, haddii asteeynta markeedii horaba lasameeyay iyadoo loo hogaansamaayo qaraar Qaramada Midoobay. Haddii asteeyntu aheyd mid maxalli ah, Guddigu isagoo raacaya habraacyada ka dhashay sharcigan ayuu ka noqonaaya asteeynta.

5. Shakhsi ama hay'ad kasta oo hantideeda ama lacagteeda lagu xayiray si waafaqsan Qodobka 7aad, balse magaciisa laga saaray Liiska Shakhsiyaadka La-asteeyay, waxa ay Guddiga ka codsan karaan inuu xayiraada ka qaado hantidooda ama lacagtooda.

Qodobka 9aad:
Dacwadaha Ka Dhanka Ah Asteeynta

1. Qofkasta oo la asteeyay, Guddiguna uusan ka qaadin asteynta markuu codsi u gudbistay kadib, wuxuu Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo keliya ka furan karaa dacwad ka dhan ah go'aamadda uu Guddigu ka gaaray codsigiisa muddo bil ah.
2. Marka ay galeyso dacwadaha ka dhanka ah go'aamada Guddiga, Maxkamadda Sare waxay ku koobaysaa dhageysiga dacwadeeda go'aan ka gaarista:
   a. In asteeynta codsadaha ay ku dhacday si qalad; ama
   b. In shuruudaha loo adeegsaday asteeynta ay yihiin kuwa wali dhaqangalka ah.
3. Inta ay ku guda jirto dacwadda, Maxkamadda Sare waa inay tixgelisaa saameynta uu go'aankeedu ku yeelan karo u hoggaansanaanta Dalka iyo waajibaadkiisa caalamiga ah, sida kuwa ka dhasha Qaraarada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee la xiriira kahortaga maal-gelinta argagixisada.
4. Haddi Maxkamadu ay u caddaato in asteynta ay u dhacday si qaldan Maxkamadu waxay go'aamineysaa magdhow u dhigma dhibta soo gaarta Shakhsiga ama Hay'adda la asteeyey.
5. Go'aanka Maxkamadda Sare wuxuu noqonayaa kama dambays.

CUTUBKA 3-AAD:
WAXYAABAHA REEBAN, KORMEERKA IYO CIQAABAHA

Qodobka 10aad:
Lacagaha Ama Hantida Ka-Reeban Xayiraadda Sababo Bini'aadannimo Darteed

1. Marka lacag ama hanti shakhsi ama hay'ada leedahay lagu soo rogaayo xayiraad si waafaqsan Qodobka 6-aad ee Sharcigan ama xeer-nidaamiye-yaashiisa, hantida ama lacagta hoos ku qoran waaka reebantahay xayiraad:
   a. Lacagaha daruuriga u ah kharashaadka nolosha ee aasaasiga ah, sida midda loogu talagalay in lagu dabbaro kirada, cunnada, caafimaadka, canshuurta, caymiska, kharashaadka waxbarashada, biyaha iyo korontada.
   b. Lacagaha maangalka ah ee loogu talagalay oo keliya bixinta kharashaadka kaalmooyinka sharciga iyo arrimaha kale ee la xiriira adeegyadaan.
   c. Lacagaha maangalka ah ee loogu talagalay oo keliya bixinta adeegyada ama khidmooyinka waajibay ee loogu talagalay keeydinta iyo ilaalinta lacagaha ama hantida la xayiray.
2. Waxaa lasoo saaraya Xeer-nidaamiye waafaqsan Sharcigan, kaasoo la jaan qaadi kara nidaamyada Qaramada Midoobay, kaaso jideeynaayay habraaca ay u hogaansamaayan shakhsiyaadka iyo hay'addaha xayiradda lasaaray marka ay isticmaalayaan lacagaha iyo hantida lagu xusay faqradda 1-aad ee Qodobkan.

Qodobka 11aad:
Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka

1. Guddiga iyo Hay'adaha Dabagalka iyo Kormeerka waxay ka dalban karaan warbixin walba oo daruuri ah, oo ay ku jiraan dukumintiyada iyo diiwaanada dhamaan Hay'adaha Warbixinnada (Reporting Entities) si'ay u hubiyaan sida ay hay'addahaasi ugu hoggaansamayaan Sharcigaan iyo Xeer-nidaamiye-yaashiisa. Hay'addaha Warbixinnada (Reporting Entities) waxaa waajib ku ah

inay siiyaan warbixinnada, dukumintiyada iyo macluumaadka ay hayaan Guddiga, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka.

2. Guddigu waa inuu faafiya warbixinnada darurariga ah oo ay ka mid yihiin liiska asteymaha lasameeyay, liiska asteymaha laga laabtay, liiska cunaqabaateynnada iyo amarada cunaqabateyn ka qaadista, si kor loogu qaado ka warqabka bulshda iyo hay'adaha, muhiimadda ay leedahay u hogaansanaanta Sharcigaan iyo Xeer-nidaamiye-yaashiisa.
3. Hay'adaha Kormeerka iyo Baarista waxaa waajib ku ah inay ilaaliyaan xogta shaqsiga ama hay'adaha inta maxkamddi go'aan kama dambeys ka gaareyso ama muddada codsiga Racafaanka uu dhamaanaya.
4. Hay'addaha Warbixinnada (Reporting Entities) waxaa waajib ku ah inay dejistaan nidaamyo iyo habraacyo kontorool oo gudaha ah oo waafaqsan Qodobka 17-aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada, si'ay u xaqiijiyaan u hoggaansanaantooda ku aadan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyayaashiisa.
5. Cidkasta oo is hortaaga hawlaha Guddiga, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ama ka horyimaada inuu la shaqeeyo inta ay gudanaayaan hawshooda waxa uu galay denbi, waxaana lagu soo rogayaa ciqaabaha maamul, madani iyo ciqaabeed ee ku haboon ee ku xuusan Qeybta 5-aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

Qodobka 12aad:
Ciqaabaha

Ku xadgudubka Sharcigan iyo Xeer-nidaamiye-yaashiisa waxaa lagu ciqaabaya si waafaqsan Qodobada 27-aad ilaa 29-aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda Iyo Maalgelinta Argagixisada ee 2016.

CUTUBKA 4-AAD:
DHAQAN-GALKA SHARCIGAN

Qodobka 13aad:
Xeer-nidaamiye-Yaasha Loogu Talagalay Dhaqangelinta Sharcigan

Waxaa lasoo saaraya Xeer-nidaamiye-yaal waafaqsan Sharcigan oo haggaaya arrimahaan:

1. Habraaca soo jeedinta asteymaha ka dhalanaaya Qaraarada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ama go'aamadda Dowladda Soomaaliya;
2. Habraaca xayiraadda hantida iyo lacagaha shaqsiyaadka iyo hay'addaha la asteeyay;
3. Habraaca ilaalinta xuquuqda garabyada sedexaad ee xayiraaddu taaban karto;
4. Habraaca uruurinta cadeeymaha iyo warbixinnada loo baahanyahay ee kusaabsan shaqsiyaadka iyo hay'addaha laga leeyahay dano khuseeya Sharcigaan iyo Xeer-nidaamiye-yaashiisa.
5. Habraaca wax ka bedelista asteeymaha iyo xayiraad ka qaadista lacagaha iyo hantida shakhsiyaadka iyo shirkadaha;
6. Habraaca u oggolaanshaha Shakhsiyaadka iyo Hay'addaha la xayiray hantidooda, sidii ay u isticmaali lahaayeen hantida iyo lacagta ka reeban xayiraada, si waafaqsan Qodobka 9-aad ee Sharcigan.
7. Nidaamka iyo habraaca hagaaya cabashooyinka ka dhanka ah asteymaha lasameeyay.
8. Nidaamyada iyo habraacyada kale ee muhiimka u ah dhaqangelinta Sharcigan.

Qodobka 14aad:
Habka Soo Saarista Iyo Meelmarinta Xeerarka Dhaqangelinta Sharcigan

1. Wasiirka Maaliyadda oo latashanaaya xubnaha Guddiga Qaran ee la Dagaalanka Lacag Dhaqidda iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada ayaa soo saarayaa xeer-nidamiyeyaasha lagu

xusay sharcigan iyo kuwa kale ee aan la xussin ee lagu dhaqan gelinayo sharcigan isagoo hor geynaya Golaha Wasiirada si ay u ansixiyaan.

2. Xeer-nidaamiyeyaasha lagu soo saaro Qodobkan farqadiisa 1aad, waa in ay waafaqsanaadaan Sharcigan.

Qodobka 15aad:
Hay'addaha Masuulka Ka Ah Dhaqan-Gelinta Sharcigan

1. Guddiga Qaran ee la Dagaalanka Lacag Dhaqidda iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada ayaa masuul ka ah korjoogteynta dhagangalka Sharcigan, ka gudoomidda warbixinnada rubuclaha iyo sanadlaha ah ee kusaabsan u hoggaansanaanta Sharcigaan Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka iyo waliba u gudbinta iyo ka gacansiinta Xeer Ilaaliyaha Guud eedeynta shakhsiyaadka iyo hay'addaha maalgeliya argagixisada.
2. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ayaa soo saaraya warbixinno rubucle iyo sanadle ah, oo leh faahfaahinno dhameystiran, kuna saabsan u hoggaansanaanta Sharcigan iyo waliba tallooyin wax ku ool ah oo ku aadan xal u helidda arrimaha warbixinnada kasoo muuqday.
3. Warbixinnada lagu xussay Faqradda 2-aad ee Qodobkaan waxaa loo Gudbinayaa Guddiga Qaran ee la Dagaalanka Lacag Dhaqidda iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada oo dhaqangelinaya tallooyinka ku xusan warbixinnada.
4. Warbixinnada lagu xussay Faqradda 2-aad ee Qodobkaan waxaa sidoo kale loo gudbinaya Golaha Wasiiradda iyo Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 16aad:
Dhaqan-galka Sharcigan

1. Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa markii ay ansixiyaan Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.
2. Haddii qodobo kamid ah Sharcigan iyo kuwa ku jira Sharci ama Xeer kale ay iska horyimaadaan, waxaaa lagu dhaqmayaa qodobadda Sharcigan.

Taariikh:20 Maarso 2023

SHARCI LR.005
OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0255/B11/23**, ku taariikheysan **19/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhowrista Xogta Dadweynaha.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Dhowista Xogta Dadweynaha.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-055-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
11 MAR 2023
SOO GELID/RECEIVED

CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad: Magaca Sharciga

Sharciga waxaa lagu magacaabaa Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

Qodobka 2aad: Eray Bixin

Haddii aan si kale loogu sheegin xeerkan gudihiisa, ereyada hoos ku qoran mid waliba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:

1. **Hay'adda**: waxaa loola jeedaa Hay'adda Dhawrista Xogta Dadweynaha, ee lagu dhisay Qodobka 6aad ee sharcigan.
2. **Xeerarka Shirkadaha:** Waxaa loola jeedaa siyaasadaha iyo habraacyada ilaalinta xogta gaarka ah ee ay u hoggaansamayaan koox shirkado ah oo wadaaga maamul guud marka ay isku gudbinayaan xogta shakhsiga ah.
3. **Xog-dhalyada:** Waxaa loola jeedaa tilmaamaha la xiriira waxyaabaha u goonida ah qofka ee lagu ogaado farsameyn gaar ah oo lagu sameeyay jirkiisa ama hab-dhaqankiisa si loo aqoonsado, xaqiijiyana aqoonsigiisa gaarka ah, sida cabbirada jirka, muuqaalka wajiga, nooca dhiigga, faraha, indhaha, codka, iyo falanqeynta baarista hidde-sidaha (DNA).
4. **Habka Hubinta:** Waxaa loola jeedaa habka ay Hay'addu ama koox kale oo dhinac seddexaad ah oo ay Hay'addu aqoonsantahay ay ku xaqiijineyso in siyaasadaha dhowrista xogta shakhsiga ah iyo habraacyada xog-maamulayaasha ama xog-adeegsadayaashu ay waafaqsan yihiin halbeegyo gaar ah oo lagu qiimeynayo.
5. **Carruur:** Waxaa loola jeedaa qofkasta oo aan qaan gaarin sharci ahaan marka loo eego da'da qaangaarka ee uu qabo Dastuurka KMG.
6. **Oggolaansho:** Waxaa loola jeedaa wax walba oo muujinaya raali ahaanshaha qofka oo isaga oo xor ah si aan mugdi ku jirin uu ku aqbalay arrin cayiman si qoraal, hadal, ama ficil ah.
7. **Xog-dhowre:** Waxaa loola jeedaa shakhsi, shirkad, hay'ad iyo wakaalad dowladeed, oo keligeed ah ama iyada oo la jirta kuwa kale, go'aamisana ujeeddooyinka iyo qaababka adeegsiga xogta gaarka ah.

8. **Xogdhowraha Haya Xogta Muhiimka ah:** waxaa loola jeedaa Xog-dhowraha deggan, fadhigiisu yahay ama ka hawlgala Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, maamulana xogta shakhsiyaadka ee oo ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
9. **Xog-adeegsade:** Waxaa loola jeedaa shakhsi, shirkad gaar loo leeyahay, hay'ad dowladeed ama wakaalad ama hay'ad kasta oo kale oo isticmaaleysa xogta shakhsiga ah, iyada oo wakiil ka ah ama hoos tagta xog-maamule ama xog-adeegsade kale;
10. **Qofka xogta leh:** Waxaa loola jeedaa qofka ay xogta shakhsiyeed la xiriirto ama laga hayo.
11. Wasiirka: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Isgaarsiinta iyo Tiknoloojiyada ama wasiir kasta oo kale ee loo xilsaaray mas'uuliyadda dhowrista xogta.
12. **Xogta Shakhsiga ah:** waxaa loola jeedaa xog kasta oo la xiriirta qof laguna aqoonsan karo qofkaasi, si toos ah ama si dadban, sida magac, tirsi aqoonsi, xogta deegaankiisa, aqoonsiga internetka, ama hal ama dhowr arrimood oo u gaar ah qofkaasi oo ku saabsan aqoonsigiisa jireed, maskaxeed, hidde-side, dhaqameed, bulsheed ama dhaqaale.
13. **Jabsashada Xogta Shakhsiga ah:** Waxaa loola jeedaa dayaca amniga xogta qofeed ee xog-dhowraha ama xog-adeegsadaha kaas oo keenaya ama laga yaabo in uu keeno xadgudub shil ah ama sharcidarro ah oo lagu sameeyo xogtaasi sida burburinteeda, tirtirdideeda, wax-ka-beddelkeeda ama shaacinteeda/bandhigiddeeda ama heliddeeda si aan la oggoleyn.
14. **Adeegsiga Xogta:** waxaa loola jeedaa uruurinta, diiwaangelinta, nidaaminta, kaydinta, wax-ka-beddelka, shaacinta, gudbinta, isku-darka, xaddidaadda, ama burburinta xogta shakhsiga ah iyadoo la adeegsanayo hab elektaroonik ah.
15. **Xogta Shakhsiyeed ee Xasaasiga ah:** waxaa loola jeedaa xogta shakhsi ee la xiriirta:
    a. Xog-dhalyada qofka;
    b. Isirka iyo qowmiyadda qofka;
    c. Xaaladda caafimaad;
    d. Diinta shakhsiga uu aaminsanyahay.
    e. Xaaladda guur ama guur la'aanta; ama nolosha jinsiyeed;
    f. aragtida ama xubinnimada siyaasadeed;
    g. Xog kasta oo kale ooHay'adda ku caddeeyso xeer-nidaamiye in ay tahay xog shakhsiyeed oo xasaasi ah.

Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Sharciga

Ujeeddooyinka Sharcigan waa:

1. In laga ilaaliyo xogta shakhsiyaadka khataraha ka dhalanaya adeegsiga xogtooda gaarka ah, oo ay kamid tahay khataraha ka dhanka ah xuquuqdooda iyo xorriyadahooda ku xusan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. kor u qaadida nidaamka adeegsi ee ilaalinaya amniga xogta gaarka ah iyo sirta dadka;
3. Hubinta in xogta gaarka ah loo adeegsado si cadaalad ah, sharciga waafaqsan isla xisaabtana leh;
4. Fududeynta In si sugan oo ammaan ah loogu wareejiyo xogta shakhsiga ah ee ku saabsan muwaadiniinta iyo dadka degan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ay hayaan hay'adaha caalamiga ahi, hay'adaha dowladda ee ku habboon, iyadoo loogu gol leeyahay bixinta adeegyada iyo fulinta hawlaha dowladda;
5. Sameynta qaab-dhismeed ay dowladda si amni leh ugu adeegsato xogta shakhsiga ah si kor loogu qaado badqabka shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo
6. Kordhinta ka faa'ideysiga xogta shakhsiyeed si loogu isticmaalo dhaqaalaha dhijitaalka ah (digital economy) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya loogana qeyb galo dhaqaalaha gobolka iyo Kan caalamiga ah.
7. In Lagu dhiso Hay, ad u gaar ah ilaalinta, nidaaminta iyo korjoogteynta Xogta Gaarka ah ee dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo tan shaqsi ee la xariirta muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Qodobka 4: Baaxadda Sharciga

Sharcigan waxaa lagu dabaqayaa keliya xog-dhowrayaasha marka:

1. Xog-dhowruhu uu degan yahay, fadhigiisu yahay ama uu ka hawlgalo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Adeegsiga xogta lagu sameynayo gudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya; ama
3. Adeegsiga xogta ay la xiriirto la socodka hab-dhaqanka, ama u bandhigiddda badeecado ama adeegyo, qof jooga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 5aad: Reebid

1. Sharcigani laguma dabaqayo xogta shakhsiga ah ee looga gol leeyahay keliya ujeeddooyin madadaalo ama arrimo guri; Sharcigaan waxaa lagu dabqayaa xogdhoraha heysta, deggan jamhuuriyada federaalka soomaaliya iyadoo aan loo kala sooceynin shakhsi, hay'ad ama wakaalad dowladeed.
2. Si waafaqsan faqradda 3-aad, sharcigan laguma dabaqayo xog-dhowraha deggan, fadhigiisu yahay ama ka hawlgala Soomaaliya haddii:
    a. Uu adeegsanayo xogta shakhsiga ah ee deggan dalka;
    b. Uusan aheyn xog-dhowre muhiim ah, ilaa laga gaarayo sannad-guurada 1aad ee taariikhda uu dhaqangalayo sharcigan.
    c. Sharcigani laguma dabaqayo adeegsiga xogta shakhsiga ah ee la xiriirta:
    d. Hay'adaha dowladeed ee awoodda u leh ka-hortagga, baarista, ogaanshaha, dacwad ku-oogista, garsooridda dembiyada iyo fulinta ciqaabta dembiyada;
    e. Hay'adaha dowladeed ee awoodda u leh ka-hortaga ama xakamaynta xaalad degdeg ah oo khuseysa caafimaadka guud ee dadweynaha;
    f. Hay'adaha dowladeed ee lagama-maarmaanka u ah amniga qaranka; ama Xogta lagama maarmaanka u ah billaabidda, dhaqan-gelinta iyo difaaca dacwadaha sharciga ah ee maxkamadda horteeda, habraaca hay'ad maamul ama hababka xallinta khilaafaadka ee ka baxsan maxkamadda
3. Waxaase shardi ah in adeegsigooda uu ku qotomo tillaabooyin macquulgal ah, cadaalad ah, waxku'oolna ah oo ilaalinaya xuquuqda iyo danaha aasaasiga ah ee shaqsiyaadka xogta leh
4. Sharcigan ma khuseeyo adeegsiga xogta ee loogu dan leeyahay ujeeddooyin saxaafadeed, waxbarasho, farshaxan ama suugaaneed, inta aysan ku xadgudbeyn waajibaadka iyo xuquuqaha ku jira Sharcigan.

CUTUBKA 2AAD: MAAMULKA

Qodobka 6: Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha

1. Sharcigan waxa uu dhisayaa Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha oo leh shakhsiyad qaanuuni ah, awoodna u leh in ay hanti mulkiso, heshiis gasho, waajibaadna lagu yeesho, taas oo lasoo dacweyn karo waxna dacweyn karta iyada oo adeegsaneysa magaceeda si waafaqsan habraacyada is-difaacidda iyo dacwad oogista hay'adaha dowladda.
2. Hay'adda waxay noqoneysaa hay'ad cusub oo madaxbannaan lehna shaqooyin, awooddo iyo waajibaad si waafaqsan sharcigan, marka:
    a. Uu Baarlamanka Federaalka Soomaaliya ee labadiisa gole ansixiyaan sharcigaan, madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee dowladda Soomaaliyana uu saxiixo.
    b. Marka la magacaabo Maareyaha Hay, adda, kaas oo mas'uul ka noqonaya Hay, adda la dhisay.
3. Haddii aan sharcigan si kale loogu sheegin, Hay'adda waxa ay u madax-banaan tahay gudashada waajibaadkeeda sida ku xusan sharcigan, wax faragalin ahna kuma yeelan karaan Wasiirka iyo Hay'adaha kale ee Dowladda.
4. Iyadoo aan loo eegeyn faqradda 3-aad ee qodobkan, Hay'addu:
    a. Waxa ay tixgelinaysaa tilmaamaha guud iyo siyaasadaha uu ku hago sharcigaan iyo haddii ay soo baxaan shuruuc kale oo dowladdu soo saarto;
    b. Waxa ay u hoggaansameysaa tilmaamaha Madaxweynaha, ama Golaha Wasiirada iyadoo la eegayo danaha amniga qaranka, nabadgelyada guud iyo difaaca qaranka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
5. Dakhliga Hay'adda ay ku socodsiineyso hawlaheeda waxa uu ka kooban yahay:
    a. Qoondadeeda miisaaniyadda guud ee Dowladda; iyo
    b. Dakhliga ka soo gala ganaaxyada maamul, khidmadaha, canshuuraha iyo ganaaxyada lagu sameeyo Sharcigan.
6. Hay'addu waxa ay diyaarineysaa, faafineysaa una gudbineysaa Wasiirka warbixin, taas oo la xiriirta hawlaheeda sannadkii hore.

Qodobka 7aad: Waajibaadka, Awoodaha Iyo Shaqooyinka Hay'adda

1. Hay'addu waa inay sare u qaaddaa dhowrista xogta shakhsiga ah, islamarkaana la socotaa dhaqangelinta sharcigan, waxayna mas'uul ka tahay inay ku fuliso Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Hay'addu waxay leedahay awoodaha ku qeexan xeerkan, waxayna qabaneysaa shaqooyinka soo socda:
    a. Waxay kobcineysaa wacyiga xarumaha dowladda ee diiwangeliya ama haya xogta gaarka ah ee ku aadan khataraha la xiriira xogta dadweynaha ee shakhsiga ah, dhowrista xogtooda gaarka ah, xuquuqda ay leeyihiin iyo waajibaadka uu saarayo sharcigan;
    b. Waxay hubineysaa in la meelmariyo soo-jeedinnada tallaabooyinka tiknoolajiyada iyo maamulka si kor loogu qaado ilaalinta xogta shakhsiga ah si waafaqsan halbeegyada caalamiga ah ee la aqoonsan yahay iyo shuruucda caalamiga ah ee ku habboon;
    c. Waxay ka qeyb galeysaa madallada caalamiga ah, waxayna la falgaleysaa hay'adaha kale ee dalalka, gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee mas'uulka ka ah dhowrista xogta iyada oo mudnaanta siineysa dhisidda qaabab joogto ah oo hufan si loo maareeyo isu-gudbinta xogta shakhsiyeed ee xudduudaha;
    d. Waxay ku korjoogteyneysaa dhamaan hay'addaha dowladda iney fuliyaan siyaasadaha la xiriira dhowrista xogta gaarka ah ee uu dhigayo sharcigaan iyo kuwa caalamiga ah;
    e. Waxay soo gudbineysaa hindise sharciyeedyada, oo ay ku jirto waxkabedelka sharciyada jira, si loo xoojiyo dhowrista xogta shakhsiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
    f. Waxay uruurineysaa ayna faafineysaa macluumaadka la xiriira dhowrista xogta gaarka ah, oo ay ku jiraan jabsashada iyo ku xad-gudubka xogta shakhsi ahaaneed;
    g. Waxay qabaneysaa cabashooyinka dadka lagu xadgudbo xogtooda gaarka, waxa ayna baaris ku sameyneysaa jabinta Sharcigan ama xeerar kasta oo kale, xeer hoosaadyada ama amarada sharcigan lagu soo saaray;

6

h. Waxay soo rogeysaa ganaaxyo maamul haddii la jabiyo sharcigan ama xeerar kasta oo kale, xeer hoosaadyada ama amarada sharcigaan lagu soo saaray;

i. Waxay xaddideysaa dalalka, gobollada, ururrada caalamiga ah ama waaxyaha buuxiyay ama aan buuxinin halbeegyada ilaalinta xogta gaarka ah ee loogu talagalay gudbinta xudduudaha;

j. Waxay wasaaradaha iyo dhamaan hay'adaha kale ee dowladda ku korjoogteyneysaa u hoggaansamidda xeererka caalamiga ah ee la xiriira ilaalinta xogta;

k. Waxay siineysaa Madaxweynah/Reysalwasaaraha/golaha wasiiradda kaalmo farsamo oo la xiriirta arrimaha dhowrista xogta;

l. Waxay diiwaan gelineysaa, sidoo kalena khidmado ka qaadeysaa maamulayaasha xogta ee muhiimka ah;

m. Waxay u gudbineysaa Golaha Wasiiradda iyadoo la kaashaneysa wasiirka hindisaha xeer-hoosaadka laga samaynayo sharcigan;

n. Waxa ay soo saareysaa tilmaamo iyo aragtiyo, ayna sameeneysaa soo-jeedinno iyo xeerar, ayna dul dhigeysaa hagitaanno xarumaha dowladda ee diiwangeliya ama haya xogta dadweynaha iyo hadba sida loogu baahan yahay in loo fuliyo loona sii qayaxo ku dhaqanka sharcigan; iyo

o. Waxay diiwaangelineysaa dhamaan xog-dhowrayaasha (Data Controls), Xog-deegsadayaasha (Data Processing), Saraakiisha Xog Dhowrista (Data Protection officers) iyo shirkadaha baara ama dabagal ku sameeya xog-dhowrayaasha & xog-adeegsadayaasha (Data Protection Audit).

3. Hay'addu waxay faafin kartaa hagitaanno ku saabsan hab-dhaqanka wanaagsan, iyo xeerarka anshaxa ee dhowrista xogta iyo u hoggaansanaanta Sharcigan.

Qodobka 8aad: Dhisidda Guddiga Maamul ee Hay'adda

1. Hay' addu waxay yeelanaysaa Guddi Maamul oo ka kooban ilaa sagaal xubnood si waafaqsan qodobka 5aad ee sharcigan;

2. Si loo dardargeliyo dhismaha Hay'adda cusub, Xubnaha gudiga maamul waxaa lasoo magacaabayaa marka ay Hay aadu howlgasho lana dhameystiro arimaha soo socdo:
    a. Marka Maareeyaha Guud u diyaariyo dhamaan waxyaabaha lagama maarmaanka u ah dhismaha Hay' adda iyo fulinta howlaheeda
    b. Marka qoondo misaaniyadeedka Hay' adda lagu daro Miisaaniyadda Dowladda Federalka.
    c. Marka Hay' addu ay yeelato xarun rasmi ah oo ay ku gudato waajibaadkeeda
3. Maareyaha guud ee lasoo magacaabo waa inuu shaqooyinka ka horreeya magacaabista golaha sare ee hay' adda ku dhameystiro muddo aan ka badneyn 2 sano dhaqangalka sharcigaan kadib.

Qodobka 9aad: Xubnaha Hay'adda

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Guddi ka kooban ilaa sagaal xubnood oo kala ah:
    a. Xubin oo ka imaaneysa Wasaaradda uuna soo magacaabayo Wasiirka;
    b. Xubin oo ka imaaneysa ganacsiga gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya, lehna khibrad aan ka yarayn Shan sano oo la xiriirta dhaqaalaha dhijitaalka ah uuna soo magacaabyo Wasiirka;
    c. Xubin oo ka socota bulshada rayidka ah oo mataleysa danaha dadka xogta leh, sidoo kalena leh khibrad aan ka yareyn Shan sano oo la xiriirta ilaalinta xogta ama ilaalinta macaamiisha, uuna soo magacaabayo Wasiirka;
    d. Qareen oo ka imaanaya Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, uuna soo magacaabayo Garyaqaanka Guud;
    e. Maareeyaha Guud ee Hay'adda
    f. Afar xubnood oo kale oo leh khibrad aan ka yareyn Shan sano kuna xeeldheer arrimaha la xiriira dhaqaalaha dhijitaalka ah, ilaalinta xogta ama ilaalinta macaamiisha.
2. Xubinnimada Guddiga waa shaqo waqti-dhaaf ah (part-time)
3. Xubnaha Guddigu waxay heli doonaan kharash-celinta dhammaan kharashaadka uga baxa shirarka Guddiga oo la qaban doono saddexdii biloodba mar haddii aanu Maareeyaha Guud ku baaqin kulan aan caadi ahayn.

4. Maareeyaha Guud iyo xubnaha Guddigu waxay xilka haynayaan muddo afar sano ah oo laba jeer oo keliya la cusboonaysiin karo.
5. Xubnaha Guddigu waxay iska dhex dooranayaan Guddoomiyaha Guddiga afartii sanaba mar.
6. Waajibaadka Guddigu wuxuu ku xadidanyahay:
    a. Dejinta siyaasadda guud iyo la socodka arrimaha guud ee Hay'adda, si hufan oo waxku'ool ah loogu qabto shaqooyinka Hay'adda;
    b. Ansixinta qorshayaasha istiraatijiyadeed, qorshe-hawleedyada iyo miisaaniyadaha uu soo gudbiyo Maareeyaha Guud;
    c. Kormeerka Sharcigan iyo qorshe kasta oo istiraatijiyadeed ama qorshe-hawleed kasta oo la meel mariyay;
    d. Ansixinta warbixin-sannadeedka uu soo gudbiyo Maareeyaha Guud;
    e. Ansixinta qorshaha shaqaaleynta Hay'adda, iyadoo la tixgelinayo baahida loo qabo xirfadlayaal iyo xaddidnaanta miisaaniyadda;
    f. La socodka qodobbada iyo shuruudaha adeegga ee shaqaalaha Hay'adda, oo ay kamid tahay mushaaraadka, gunnooyinka iyo dheefaha hawlgabka;
    g. Ansixinta xeerarka anshaxa, iyo habraacyada iyo tallaabooyinka anshax-marinta hawl-wadeennada, saraakiisha iyo shaqaalaha kale ee Hay'adda oo Maareeyaha Guud soo gudbiyo;
    h. La-talinta iyo u-tusaaleynta Maareeyaha Guud;
    i. U gudbinta Golaha Wasiiradda warbixin-hawleedyada iyo horumarrada laga gaaray qorshaha maamulka Hay'adda, marka uu soo dalbadaan; iyo

Qodobka 10aad: Maareeyaha Guud Iyo Hawl-Wadeennada Hay'adda

1. Maareeyaha Guud waa:
    a. Mas'uulka ugu sarreeya ee Hay'adda;
    b. Waxa uu u xilsaaran yahay hoggaaminta iyo maaraynta hawl-maalmeedka Hay'adda iyo hubinta inay Hay'addu gudato waajibaadkeeda ku xusan Sharcigan; sidoo kale;

c. Waxa uu leeyahay awood sharci uu ku matalo Hay'adda.

Qodobka 11aad: Xil Ka Qaadista Xubin Kamid Ah Guddiga Maamulka Ama Maareeyaha Guud

Maareeyaha Guud ama Xubnaha hay'adda waxay xilka ku waayna karaan arrimaha soo socdo:

1. Lagu xukumay ama si kale loo shaaciyay inuu musallafay si waafaqsan sharci kasta oo dhaqangal ka ah jamhuuriyadda federaalka soomaaliya qeyb kasta oo kamid ah Soomaaliya;
2. Lagu xukumay dambi ku lug leh daacad-darro, khiyaano, wax isdaba-marin, sameyn dukumintiyo been-abuur ah ama fal-dembiyeed kasta oo ciqaabtiisu la egtahay ama ay ka badan tahay Shan sano ay ku xukuntay maxkamad.
3. In caafimaad ahaan uu dhaqtar idman oo aqoon u leh ku caddeeyo in maskax ahaan uusan taam aheyn, ama haddii uu noqdo qof aan Karin gudashada waajibkiisa jirro darteed ama dhaawac soo gaaray.
4. Haddii lagu helo faldambiyeed culus oo la xiriira waajibaadkiisa shaqo kadib baaris lagu sameeyay, laguna garsooray fadhi maxkamad oo caddaalad ah.

Qodobka 12aad: Iska-horimaadka Danaha

1. Ma jiro xubin kamid ah Guddiga, ama Maareeyaha Guud, ama shaqaalaha Hay'adda oo maslaxad ama dan ku yeelan Kara xog-dhowre muhiim ah, ama xog-adeegsade kasta oo uu qabanayo Sharcigan, kaas oo Hay'adda marsiineyso habraacyadeeda maamul, dib-u-eegis, baaris iyo fulin.
2. Maslaxadaha ku xusan faqradda 1-aad waxaa kamid ah:
    a. Dan dhaqaale uu ku leeyahay/leedahay xaaskiisa/saygeeda, xubnaha qoyskiisa ama qaraabada kale;
    b. Dan dhaqaale ay ku leedahay/leeyahay shirkad uu saamiyo ku leeyahay ama damaanado kale oo dhaqaale, si toos ah ama si dadban;
    c. Dan dhaqaale uu ku leeyahay ama ay ku leedahay shuraakadiisa ganacsiga;

d. Haddii uu dhinac ka ahaa gorgortanka, heshiis uu galay xog-dhowre, xog-adeegsade kasta oo uu matalayay, wakiil u ahaa, shaqaale u ahaa ama uu u qabanayay hawl kasta oo kale.

3. Haddii xubin kamid ah Guddiga, Maareeyaha Guud, Maareeye ku-xigeenka ama shaqaale ka tirsan Hay'adda uu maslaxad ku leeyahay sida ku xusan faqradda 1-aad, haddaba isagu/iyadu waa:
   a. Inuu Guddiga u soo bandhigo danta uu ku leeyahay xog-dhowrahaas ama xog-adeegsadahaas, uuna nafsaddiisa gees uga saaraa hawlkasta oo la xiriirta iyagu, uusana ka helin wax macluumaad ah oo ku saabsan arrintan.
   b. Waa inuu si aan kasoo laabasho laheyn markiiba ugu tanaasulaa dantaas heer ay ku qanci karaan Guddiga; ama
   c. Inuu iska casilo xilkiisa Hay'adda.

CUTUBKA 3AAD: MABAADI'DA LAGU MAAMULAYO ADEEGSIGA XOGTA SHAKHSIGA AH

Qodobka 13aad: Aasaaska Hay'adda Dhowrista Xogta

1. Hay'addu waxay nogonaysaa hay'ad madax bannaan si waafaqsan godobka 6aad marka xeerkan uu dhagangalo, waxayna nogonaysaa hay'ad leh dhammaan hawlaha, awoodaha iyo waajibaadka ku xusan xeerkan;
2. Hay' addu waxay yeelanaysaa Maareeyaha Guud ee hay'adda dhowrista xogta dadweynaha, waxaa soo jeedinaya magacaabistiisa wasiirka wasaaradda isla markaana waxaa ansixinaya Golaha Wasiirada waxaana xeer madaxweyne ku magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   a. Maareeyaha Guud waa in uu khibrad u leeyahay arrimaha ilaalinta xogta, maamulka dawladda, ganacsiga ama sharciga.
   b. Maareeyaha Guud waxa uu u xilsaaranyahay gudashada hawlaha, awoodaha iyo waajibaadka Hay'adda ee ku xusan sharcigan.

c. Hawlaha hay' adda waxa lagu socodsiinayaa qoondada Miisaaniyadda Qaranka iyo dakhliga ka soo gala ganaaxyada maamul, khidmadaha, canshuuraha ee lagu qaado xeerkan;

3. Wasiirku waxa uu fududeenayaa maareeyaha guud inuu helo shaqaale iyo agabka ay hay'addu ku fulineyso howlaheeda.

Qodobka 14aad: Sharci Ahaanshaha Adeegsiga Xogta Shakhsiga Ah

1. Xog-dhowraha xogta waa inuu xaqiijiyaa in xogta shakhsiga ah loo isticmaalo si caddaalad ah, hufnaan leh oo waafaqsan faqradda 2-aad.
2. Xogdhowraha xogta waa in aanu adeegsan xogta shakhsiga ah, uusan oggolaanin in la adeegsado xogta shakhsiyeed ee uu masuulka ka yahay illaa:
   a. qofka xogta leh uu oggolaaday uusana ka laaban oggolaanshihiisa in xogta loo adeegsado ujeeddooyinka cayyiman ee loo sheegay;
   b. adeegsiga uu lagama maarmaan u yahay gelidda ama fulinta heshiis lala galayo qofka xogta leh;
   c. adeegsiga uu lagama maarmaan u yahay u hoggaansamidda waajibaad sharci;
   d. adeegsiga xogta ay lama huraan u tahay billaabidda, sameynta ama iska difaacidda dacwad sharci, helidda talo sharci ama furista gal-dacwadeed;
   e. adeegsiga lagu oggolaaday sharci ayna sameeneyso hay'ad dowladeed oo awood u leh;
   f. Adeegsiga uu muhiim u yahay badbaadinta nolosha qof.
   g. Adeegsiga lagu fulinayo ujeedooyin daryeel caafimaad ama ujeeddooyin bulshada wax wanaagsan loogu qabanayo.
   h. adeegsiga uu daruuri u yahay ka- jawaabista xaalad bini'aadantinimo oo cayiman ayna suurtagal aheyn in la sameeyo sifo kale 'oo sharci ah oo lagu adeegsado faqraddan muddo macquul ah gudaheed;
   i. adeegsiga uu muhiim u yahay fulinta hawl dan guud ah iyo gudashada hawl rasmi ah oo loo igmaday xog-dhowraha;

j. adeegsiga waxa uu lagama maarmaan u yahay ujeedooyin la xiriira dano sharciga waafaqsan oo uu leeyahay xog-dhowraha ama dhinac saddexaad oo xogta shakhsiga si sharci ah loogu shaac-qaaday, haddii danahaasi aysan ku xadgudbeyn xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyaadka dadka xogta leh;

k. adeegsigu waxa uu lama huraan u yahay xaqiijinta ujeedooyin dan guud ah, ama ujeeddooyin taariikheed, tirakoob, ama cilmi-baaris; ama

l. Qofka xogta leh ayaa xogtiisa shakhsiga ah si kutalagal ah shaaca ugu qaaday.

3. Haddii xogta shakhsi ahaaneed loo adeegsanayo ujeeddo aan aheyn mid markii hore loo uruuriyay, waa inuu ujeedkaasi ahaadaa mid sharciga waafaqsan Lana jaanqaadaya ujeedka asalka ah ee xogta loo uruuriyay.

4. La jaanqaadidda ku xusan faqradda 3-aad waa in lagu qiimeeyaa iyadoo la eegayo:

a. xiriirka ka dhexeeya ujeedka asalka ah iyo ujeedka dheeraadka ah la doonayo in xogta loo adeegsado;

b. illaa inta ay xasaasi tahay xogta gaarka ah ee la adeegsanayo;

c. cawaaqibka iyo khataraha ka dhalanaya adeegsigan dheeraadka ah;

d. sida xogta shakhsiyeed loo uruuriyay; iyo

e. Inay jirto ilaalin iyo dhowris ku habboon.

5. Hay'addu waxa ay xeer-hoosaadka ku sheegi kartaa tallaabooyin ay tahay in la qaado lana dhaqangeliyo marka la adeegsanayo xogta shakhsiyeed ee xasaasiga ah, qeybaha xogta shakhsiyeed ee xasaasiga ah iyo noocyada dadka xogta leh, isaga oo tixgelinaya:

a. Khatarta waxyeello ee kasoo gaari karta qofka xogta leh, ama noocyada dadka xogta leh haddii la adeegsado xogtan shakhsiyeed ee xasaasiga ah;

b. filashada macquulka ah ee xafidida iyo qarsoodi ka dhigidda noocan xog ee xasaasiga ah; iyo

c. Qiimeynta tayada xog-dhowris ee la siiyay guud ahaan xogta shakshsiga ah.

Qodobka 15aad: Faafaahinta Ujeedka, Yaraynta Xogta, Keydinta Iyo Saxsanaanta.

Xog-dhowraha xogta waa inuu xaqiijiyaa in xogta shakhsiyeed ee uu adeegsanayo ay tahay:

a. mid loogu soo uruuriyay ujeeddooyin cayiman, cad oo sharci ah, loona adeegsanin si kale oo aan la jaanqaadeyn ujeedooyinkan;

b. mid ku filan, ku habboon kuna kooban xogta ugu yar ee lagama maarmaanka ah;
c. mid uu haynayo keliya inta laga gaarayo ujeeddooyinkaas, marka laga reebo:
d. in heyntiisa xogta uu u baahan yahay ama uu sharcigu u oggolaaday; ama
e. in dadka xogta leh ay oggolaadeen sii-haynta iyo keydinta xogtooda
f. Mid sax ah, dhammaystiran, aan wax Marin-habaabineyn iyo, haddii loo baahdo, la cusbooneysiin karo.

Qodobka 16aad: Caruurta Iyo Dadka Kale Ee Aan Lahayn Awood Sharci

1. Marka qofka xogta leh uu yahay ilmo ama shakhsi aan si kale u lahayn awood sharci, oggolaansho kasta oo loo baahan yahay waa in laga helaa waalidkiisa ama qofka kale ee wakiilka sharci u ah.
2. Xog-dhowraha xogta waxa uu qaadan karaa ogolaanshaha uu bixiyo ilmo gaaray da'da qaangaarka si waafaqsan qodobka 14(2) (a), marka ay ku saleysan tahay bixinta macluumaad ama adeeg qaab elektaroonig ah oo ku dhisan codsiga gaarka ah ee qaataha.
3. Hayu'addu waxa ay xeer-hoosaadka ku sheegi kartaaa in faqradda 2-aad ee qodobkan lagu dabaqi karo ilmo da'da qaangaarka ka yar.
4. Xog-dhowraha xogta waa inuu sameeyaa tallaabooyinka ku habboon si uu u xaqiijiyo aqoonsiga iyo da'da qofka xogta leh iyo wakiilkiisa, xiriirka uu la leeyahay qofka xogta leh iyo oggolaanshaha.
5. Marka la dabaqayo faqradda 4-aad, dukumentiyada aqoonsi ee dowladdu ansixisay ayaa ah habka ku habboon.
6. Faqradda 1-aad ee qodobkan lama dabaqayo marka:
    a. adeegsiga xogta uu lagama maarmaan u yahay ilaalinta danaha muhiimka ah ee ilmaha ama qofka kale aan laheyn awoodda sharci ee oggolaanshaha;
    b. adeegsiga xogta lagu fulinayo ujeeddooyin waxbarasho, caafimaad ama daryeel bulsho taas oo hoos imaaneysa masuuliyadda xirfadle ama adeeg bixiye ay saaran tahay waajib xog-dhowris ah; ama
    c. Adeegsiga xogta uu muhiim u yahay dacwad maxkamad hor taalla oo khuseysa ilmaha ama qofka kale aan laheyn awoodda sharci.

Qodobka 17aad: Saamaynta Oggolaanshaha Qofka Xogta Laga Qaaday

Xog-dhowraha xogta waxaa saaran culeyska caddeynta in uu sameeyay oggolaanshaha qofka marka adeegsiga xogta ay u baahan tahay oggolaansho si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 18aad: Siinta Macluumaad Qofka Xogta Leh

1. Maamulaha xogta waa inuu hubiyaa in qofka xogta leh lagu wargeliyay kahor inta aan xogta laga qaadin arrimahan:
    a. aqoonsiga, iyo siyaabaha uu kula soo xiriiri karo Xog-dhowraha Xogta;
    b. ujeeddada xogtiisa loo adeegsanayo si waafaqsan qodobka 14(2)
    c. aqoonsiga hay'ad kasta ama qof kasta oo xogta shakhsiga ah lala wadaagi doono;
    d. xuquuqda uu leeyahay ee ku xusan cutubka 4aad iyo xaqiisa inuu cabasho u gudbin karo Hay'adda si waafaqsan qodobka 31-aad; iyo
    e. Faafaahinta aaladaha go'aan-qaadasho ee xogta lagu farsameeyo, sida aaladaha loo adeegsado qofeynta (profiling), ujeedka loo isticmaalayo iyo cawaaqibka suurtagalka ah ee kasoo gaari karta isticmaalka aaladahan.
2. Haddii macluumaadka lagu sheegay faqradda 1-aad aan markii hore la siin qofka xogta leh, xog-dhowraha waa inuu sida ugu dhakhsaha badan ku siiyaa waqtiga ugu dhow.
3. Faqradda 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan lama dabaqayo haddii in loo hoggaansamo aysan suurtaggal aheyn, ama ay u baahan tahay dadaal ama kharash aan u dhigmin.

Qodobka 19aad: Mas'uuliyadda Degsashada Xogta Shakhsiga

1. Maamulaha xogta waa inuu diiwaan geliyaa dhammaan xog-degsadayaasha isticmaala xogta shakhsiga ah ee uu hayo, ayna ku jiraan xog degsadayaasha hoos taga kuwa kale.
2. Xog-dhowraha xogta waa inuu qaadaa tillaabooyin macquul ah uu ku hubinayo in xog-adeegsadaha u isticmaalayo xogta waxa ka khuseeya xog-dhowraha:

a. inuu ku sameeyo degsigsa xogta shakhsiga ah hab waafaqsan Sharcigan;
b. inuu bixinayo dhammaan ogeysiisyada, macluumaadka iyo arrimaha looga baahan yahay si xog-dhowraha ugu hoggaansamo qodobbada Sharcigan;
c. inuu xog degsadaha buuxiyo shuruudaha ku xusan qodobka 24-aad; iyo
d. Inuu xafido diiwaanka si degdeg ahna ku ogeysiiyaa xog-dhowraha haddii la jabsado xogta shakhsiga ah, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xiriira jabsashada, saameynteeda iyo tallaaboonka la qaaday si loo xalliyo.

3. Tallaabooyinka ku xusan faqradda 2-aad ee qodobkan waxaa kamid ah in heshiis qoraal ah wada galaan xog-dhowraha xogta iyo xog degsadaha, iyo inuu xog degsadaha heshiis sidaan oo kale ah la galo cidkasta oo kale oo ku lug yeelaneysa isticmaalka xogta.
4. Dhammaan tixraacyada sharcigan ee ku saabsan degsiga xogta shakhsiga ah waxa ay ku waajibinayaan xog-dhowraha xogta inuu u hoggaansamo nidaamka degsiga xogta ee Sharcigan.

CUTUBKA 4AAD: XUQUUQDA QOFKA XOGTA LEH

Qodobka 20aad: Xuquuqda Xaqiijinta, Gelitaanka, Sixidda Iyo Tirtiridda

1. Iyada oo la ilaalinayo faqradda 2-aad ee qodobkan, qofka xogta leh waxa uu xaq u leeyahay inuu xog-dhowraha xogta ka helo asbaabta loo adeegsanayo xogtiisa, iyo inuu si bilaash ah oo aan dib udhac laheyn ku helo:
   a. xaqiijinta in xogtiisa gaarka ah la isticmaalayo iyo in kale, iyo isha xogta;
   b. Nuqul kamid ah xogtiisa gaarka ah oo lagu siinayo qaab elektaroonik ah;
   c. sixidda, ama haddii sixitaanku suurtagal ahayn ama ku habbooneyn, in laga tirtiro xogta qaldan, taariikhdeedu dhaaftay, aan dhamaystirnayn ama marin-habaabinta ah; iyo
   d. Tirtiridda xog kasta oo shakhsi ah uu xog-dhowraha xogta xaq u lahayn inuu sii hayo.
2. Marka la dajinayo khidmadda ku xusan faqradda 2-aad, waxaa la tixgalinayaa kharashaadka maamul ee bixinta macluumaadka ama gaarsiinta ama qiimaha ay ku kaceyso qaadista tallaabada la codsaday.

3. Haddii xuquuqda qofka xogta leh ee ku xusan faqradda 1-aad ay tahay mid aan sal laheyn ama xad dhaaf ah, gaar ahaan haddii ay tahay mid soo noqnoqoneysa, xog-dhowraha xogta wuxuu ku dalaci karaa qofka xogta leh khidmad macquul ah ama wuu diidi karaa codsigaas;

Qodobka 21aad: Xaqa Ka Noqoshada Ogolaanshaha

1. Qofka xogta leh waxa uu xaq u leeyahay inuu ka noqdo ogolaanshihiisa adeegsiga xogta ee uu hore u bixiyay.
2. Maamulaha xogta waa inuu xaqiijiyaa in qofka xogta leh uu si fudud ugu noqon karo oggolaanshihiisa, uuna ku wargeliyo natiijada ka dhalaneysa arrintaas.

Qodobka 22aad: Xaqa Diidmada

1. Qofka xogta leh waxa uu xaq u leeyahay inuu diido:
    a. adeegsiga xogtiisa gaarka ah ee ku saleysan qodobka 14(2)(i), (j) ama (l) haddii adeegsigaas ay kasoo gaareyso dhibaato ama waxyeello aan damaanad laheyn;
    b. Sida ku xusan qodobka 23-aad, inuusan masuul ka aheyn go'aannada ku saleysan aaladaha xogta farsameeya, sida qofeynta.
2. Haddii qofka xogta leh si sharci ah udiido adeegsiga xogtiisa si waafaqsan faqradda 1-aad, xog-dhowraha waa inuu joojiyaaa isticmaalka xogtaas, illaa ay jirto dan guud ama sababo kale oo sharci ah oo ka miisaan culus dhibaatada iyo waxyeellada shakhsi ahaantiisa soo gaareysa.

Qodobka 23aad: Xaqa in Uusan Masuul Ka Aheyn Go'aan Ku Saleysan Keliya Aaladaha Xogta Farsameeya

Qofka xogta leh waxa uu xaq u leeyahay inusan masuul ka aheyn go'aan ku saleysan keliya aaladaha xogta farsameeya, sida qofeynta, taas oo ay ka dhalaneysa saameyn sharci oo khuseysa isaga, marka laga reebo in go'aanadaas:

1. lagama maarmaan u yihiin gelidda ama fulinta heshiis u dhexeeya qofka xogta leh iyo maamulaha xogta;
2. lagu oggolaaday sharci qoran oo u yeelaya tallaabooyin ku habboon si loo ilaaliyo xuquuqda aasaasiga ah iyo danaha qofka xogta leh; ama
3. Qofka xogta leh ku aqbalay oggolaanshihiisa.

CUTUBKA 5AAD: AMNIGA XOGTA IYO QIIMAYNTA SAAMAYNTA XOGTA

Qodobka 24aad: Amniga, Hufnaanta, Iyo Sir-Ahaanshaha Xogta Shakhsiga Ah

1. Xog-dhowraha xogta waa inuu hirgeliyaa tillaabooyinka farsamo iyo nidaamyada ku habboon in lagu xaqiijiyo amniga, hufnaanta iyo sir ahaanshaha xogta gaarka ah ee uu hayo ama maamulo, ayna kamid tahay inuu xogta ka ilaaliyo burbur shileed ama mid sharcidarro ah, ama inay lunto, si xun loo isticmaalo, la baddalo, lala wadaago ama ay gasho cid aan loo oggoleyn.
2. Marka la fulinayo tallaabooyinka ku xusan faqradda 1-aad, xog-dhowruhu waa inuu ku xisaabtamaa:
    a. heerka ay la egtahay iyo xasaasinimada xogta shakhsiyeed;
    b. dabeecadda iyo heerka ay gaarsiisan tahay waxyeellada soo gaari karta dadka xogta leh haddii ay lunto, shaaca laga qaado ama si qaldan loo isticmaalo xogtooda;
    c. inta ay le'eg tahay adeegsiga;
    d. muddada haynta xogta; iyo
    e. Helitaanka iyo kharashka ku baxaya teknoolajiyada, agabka ama nidaamyada kale ee la hirgelinayo.
3. Nidaamyada aan lagu fulin sida ku xusan faqradda 1-aad waxa kamid ah:
    a. isticmaalka nidaamka 'pseudonymization' iyo hababka aqoonsi-daboolka (de-identification) ee xogta shakhsiga ah;
    b. hababka rogaal-akhriska xogta shakhsiga ah (encryption methods);
    c. hababka lagu xaqiijinayo amniga, nabad gelyada, sir ahaanshaha, helidda iyo adkeysiga nidaamyada iyo adeegyada;

d. hababka lagu soo celiyo helitaanka iyo isticmaalka xogta shakhsiga ee waqtiga ku saleysan haddii uu dhaco shil muuqda ama mid farsamo;
e. qiimayn xilliyeed lagu sameeyo khataraha ku iman kara nidaamyada adeegsiga xogta, adeegyada iyo shabakadaha isgaarsiinta elektiroonigga ah;
f. tijaabooyin joogto ah, qiimaynta iyo qiyaasidda waxtarka tillaabooyinka la hirgaliyay ee lidka ku ah khataraha hadda jira iyo kuwa imaan doona ee macquulka ah;
g. Cusboonaysiinta joogtada ah ee nidaamyada iyo soo bandhigida kuwa cusub oo wax looga qabanayo cilladaha iyo gaabisyada jira loona daboolo khataraha soo darsi Kara.

Qodobka 25aad: Ogeysiisyada Jabsashada Xogta

1. Marka ay dhacdo in la jabsado ama lagu xadgudbo xogta shakhsiga ah, ayna u badan tahay inay ka dhalato khatar ku imaaneysa xuquuqda iyo xorriyaadka dadka, xog-dhowruhu waa inuu hay'adda ogeysiiyo jabsashada toddobaatan iyo laba saac gudahood, kaddib markii uu ogaaday;
2. Xog-dhowraha xogta waxa uu kororsan karaa muddada 72-ka saac ah ee ku xusan faqrada sare, si uu u daboolo baahiyaha sharciga ah ee ka dhalan Kara arrintaan ama si uu uqaado tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si uu ogaado baaxadda jabsashada.
3. Haddii Xog-dhowraha xogtu uu kororsado muddada si waafaqsan faqradda 2-aad, waxa uu ku wargalinayaa Hay'adda sababaha uu ukororsaday, oo ay la socoto cadaymo xoojinaya, inta lagu guda jiro muddada 72-ka saac ee ku xusan faqradda 1-aad;
4. Iyadoo la raacayo faqradda 5-aad, marka jabsashada xogta shakhiga ah ay u badan tahay inay keento khatar weyn oo ku wajahan xuquuqda iyo xoriyaadka dadka xogta leh, xog-maamuluhu waa inuu sidoo kale ogeysiiyaa shakhsi kasta oo ay saameysay si aan daah ku jirin laguna sheegayo luqad cad.
5. Haddii la-xiriirka tooska ah ee dadka xogta leh ee lagu tilmaamay faqradda 4-aad ay ku kaceyso dadaal xoog leh iyo qarash adag oo aan la qiyaasi karin, amaba aysan suurtagal aheyn, xog-maamulaha waxa uu farriinta u marsiin karaa dadka xogta leh mid kamid ah ilaha warbaahineed ee sida ballaaran loo isticmaalo

6. Marka la qiimaynayo halista ku wajahan xuquuqda iyo xorriyaadka dadka xogta leh sida ku xusan faqradda 4-aad, xog-dhowraha Xogta waa inuu xisaabta ku darsadaa:
    a. Waxtarka ay leedahay tallaabo kasta oo farsamo ama maamul ee la qaado si loo yareeyo waxyeelada suurtagalka ah ee ka dhalan karta jabshashada xogta;
    b. Sameynta tallaabo kasta oo gacan ka geesaneysa dhimista khasaaraha; iyo
    c. Dabeecadda, baaxadda iyo xasaasinimada xogta shakhsiyeed iyo nuglaanta dadka xogta leh.
7. Hay'addu waxay waqti kasta samayn kartaa wargelin dadweyne oo ku aaddan xogta shakhsiga ah ee la jabsaday, haddii ay u aragto in aanay ku filnayn ogeysiiska uu xog-dhowraha siiyay dadka xogta leh si waafaqsan faqradda 4-aad.

Qodobka 26aad: Nuxurka Ogeysiisyada Jabsashada Xogta Iyo Wargelinta

1. Ogeysiisyada jabsashada xogta shakhsiga ah iyo wargelinta loogu baahan yahay inuu sameeyo xog-maamulaha sida ku xusan Qodobka 25-aad waa sidan:
    a. in la tilmaamo dabiicadda xogta gaarka ah ee la jabsaday, iyo, haddii ay suurtagal tahay, qaybaha iyo qiyaasta tirada dadka ay xogtooda shakhsi ahaaneed khusayso;
    b. in la sheego magaca iyo faafaahinta halka lagala soo xiriiri karo xog-dhowraha oo macluumaad dheeraad ah laga heli karo;
    c. in la xuso natiijada suurtaggal ah ee ay u badan tahay inay ka dhalato jabsashada taas oo gaareysa dadka xogta leh;
    d. In sharraxaad laga bixiyo tallaabooyinka uu qaaday ama uu qaadi doono xog-dhowraha si uu wax uga qabto jabsashada xogta, taas oo ay ku jirto tallaabo kasta oo lagu dhimayo saameynteeda xun.
    e. Marka ogeysiiska la siinayo dadka xogta leh ama lagu sheegayo wargelin dadweyne, waa in la raaciyaa talooyinka iyo tallaabooyinka ay tahay inay sameeyaan dadka xogtooda la jabsaday si ay u yareeyaan waxyeellada macquulka ah ee soo gaari karta.
2. Haddii aanay suurtogal ahayn in la bixiyo macluumaadka ku xusan qodobkan halmar, xogta waxaa lagu bixin karaa heerar iyada oo aan dib loo dhigin.

Qodobka 27aad: Diiwaangelinta Jabsashada Xogta

Xog-dhowre kasta waa inuu diiwaan geliyaa dhammaan xogta shakhsiga ah ee laga jabsaday nidaamyadiisa, iyo sidoo kale xaqiiqooyinka la xiriira jabsashada xogtaas, saameynteeda iyo tallaabooyinka magdhow ee la qaaday qaab u saamaxeysa Hay'adda inay hubiso u hoggaansamidda Cutubkan.

Qodobka 28aad: Hagidda Hay'adda

Hay'addu waxa ay soo saareysaa hagid ku saabsan tillaabooyinka ay qaadayaan xog-dhowrayaasha si ay ugu hoggaansamaan ogaysiisyada jabsashada xogta iyo waajibaadka wargelin ee ku xusan Cutubkan.

Qodobka 29aad: Qiimaynta Saamaynta Ilaalinta Xogta

1. Marka adeegsiga xogta ee xog-dhowraha xogta ee muhiimka ah ay u badan tahay inay keento khatar sare oo ku wajahan xuquuqda iyo xorriyaadka dadka xogta leh dabiicad ahaan, baaxad ahaan, siyaaqeeda guud iyo ujeedooyinka loo isticmaalayo, maamulaha xogta ee muhiimka ah waa:
    a. inuu sameeyo Qiimaynta Saamaynta Ilaalinta Xogta kahor inta uusan adeegsan; iyo
    b. Inuu Hay'adda usoo gudbiyo warbixinta qiimaynta saamaynta xogta.
2. Xog-dhowraha xogta ee muhiimka ah waa inuu kala tashadaa Hay'adda inta uusan isticmaalin xogta, iyada oo aan loo eegin tillaabooyinka ku xusan faqradda 4(d), haddii ay qiimeynta keenayso khatar sare oo ka dhan ah xuquuqda ah iyo xorriyaadka dadka xogta leh.
3. Hay'addu waa inay soo saartaa hab-raacyo ku saabsan:
    a. sida loo sameynayo Samaynta Qiimaynta Xogta; iyo

b. Qaababka adeegsiga ee lagu sameynayo qiimaynta saamaynta xogta si waafaqsan faqradda 1-aad.

4. Ujeedooyinka qodobkan, "qiimaynta saamaynta ilaalinta xogta" waa qiimayn lagu ogaanayo saamaynta uu ku yeelan adeegsiga la qorsheeyay dhowrista xogta shakhsi ahaaneed waxa ayna ka kooban tahay:
    a. sharaxaad nidaamsan oo laga bixiyo adeegsiga la qorsheeyay iyo ujeedkiisa, oo ay ku jirto caddeynta danta sharciga waafaqsan ee loogu gol leeyahay adeegsiga;
    b. siimaynta baahida iyo saamiga adeegsiga ee la xiriira ujeedooyinka xogta shakhsiga ah loo isticmaali doono;
    c. qiimaynta khataraha ku wajahan xuquuqda iyo xorriyaadka dadka xogta leh; iyo
    d. Tallaabooyinka loo diyaariyay in wax looga qabto haddii khatarahaas dhacaan iyo tallaabooyinka amni iyo hababka lagu sugayo ilaalinta xogta shakhsiga ah iyo in la muujiyo ka go'anaanshaha u hoggaansamidda Sharcigan.
5. Wasiirku waxa uu sameyn karaa xeerar maamul uu kaga reebayo qeybo kamid ah xog-dhowrayaasha muhiimka ah qaar kamid ah ama dhammaan waajibaadka Qodobkan ku xusan.
6. Marka la go'aaminayo wixii ka-reebid ah sida ku cad faqradda 5-aad, Hay'addu waa inay tixgelisaa:
7. culayska iyo saamiga diyaarinta qiimaynta saamaynta ilaalinta xogta;
    a. Suurtagalnimada iyo culayska khataraha ku imaan kara xuquuqda iyo xorriyaadka dadka xogta leh; iyo
    b. Hababka kale ee lagu qiimeyn karo laguna yareyn karo khatarahaas.

CUTUBKA 6AAD: GUDBINTA XUDUUDDA EE XOGTA SHAKHSIGA AH

Qodobka 30aad: Heerka Ilaalin Eek U Habboon Gudbinta Xuduudaha Ee Xogta Shakhsiga Ah

1. Xog-dhowraha xogta uma wareejin karo xogta shakhsiyeed dal ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama hay'ad caalami ah illaa la buuxiyo mid kamid ah shuruudahan:

a. xogta shakhsiga ah waxaa helaya keliya dal ama dalal, gobolo ama qeyb cayiman oo kamid ah dal gaar ah kaas xogta siiya ilaalin ku habboon;
b. xog-qaataha waa hay'ad ama urur caalami ah oo siyaasadiisa iyo tallaabooyinkiisa maamul iyo farsamo ay xogta siinayaan ilaalin ku habboon;
c. xog-qaataha waxa uu u hoggaansamaa xeerar shirkadeed oo waajib ah, qodobbo heshiis, xeerar anshax, habka caddeynta ama halbeegyo kale oo xogta siinaya ilaalin ku habboon; ama
d. Xog-qaataha waxaa ku dabaqmaya mid kamid ah asbaabta sharci ee ku xusan qodobka 31-aad.

2. Waxaa lagu qiimeynayaa ku habboonaanta heerka ilaalinta xogta ee ku xusan faqradda 1-aad iyadoo la tixgelinayo:
a. in qaabka ilaalintu ay ku saleysan tahay mabaadi' si weyn ula mid ah shuruudaha adeegsiga xogta shakhsiyeed ee lagu sheegay Sharcigan, ayna kamid tahay mabaadi'da la xiriirta gudbinta xogta shakhsiga ah meel ka baxsan ikhtisaaska qaataha;
b. inay jirto ixtiraamka xuquuqaha dadka xogta leh, iyo awoodda dadka xogta leh ay u leeyihiin inay fuliyaan xuquuqdooda iyaga oo u maraya habraac maamul ama garsoor, iyo sarreynta sharciga guud ahaan;
c. Jiritaanka heshiis ama dukuminti qoraal ah oo udhaxeeya Hay'adda iyo hay'adda dowladeed ee dhiggeeda ah ee ka jirta dalka xog-qaataha taas oo ku saabsan ilaalinta xogta;
d. isticmaalka xogta shakhsiga ah ee hay'ad dowladeed shisheeye;
e. jiritaanka Sharci Xog-dhowris oo wax ku ool ah kaas oo dhaqangal ka ah dalka uu ku sugan yahay xog-qaataha helaya xogta shakhsiyeed;
f. Jiritaanka iyo inay shaqeeneyso hay'ad madax-bannaan oo karti uleh ilaalinta xogta, ama hay'ado kale oo kormeer oo lamid ah kuwaas oo leh awoodo fulin dalka xog-qaataha;
g. Heshiisyo caalami ah oo khuseeya xog dhowrista kuwaas uu saxiixe ka yahay dalka xog-qaataha iyo inuu ku jiro ururro caalami ah ama urur goboleedyo ilaaliya xogta.

3. Xog-dhowraha xogta waa inuu diiwaan geliyaa shardiga ku xusan faqradda 1-aad ee loo cuskaday in loogu oggolaado u gudbinta xogta shakhsiyeed dal ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama urur caalami ah, iyo sidoo kale qiimayn kasta oo lagu sameeyay si waafaqsan faqradda 2-aad;
4. Hay'addu waxay:
   a. soo saari kartaa xeerar iyo hagitaanno la xiriira qiimaynta ku habboonaanta ilaalinta xogta iyo arrimaha ku xusan faqradda 1-aad iyo 2-aad ee Qodobkan
   b. go'aamin kartaa in urur ama hay'ad caalami ah, dal, gobol ama qeyb cayiman oo dal kamid ah iyo sidoo kale in sharci, xeerar shirkadeed oo waajib ah, qodobo heshiis, xeerar anshax, habka caddeynta ama halbeeg kale uu bixinayo ama uusan bixineyn illaalin ku habboon si waafaqsan faqradda 1-aad;
   c. hagid iyo talooyin ka siin kartaa xog-dhowruhu illaa heerka ilaalin ee la bixiyay si uu u wareejiyo xogta shakhsi ahaaneed sida ku xusan faqradda 1-aad; iyo
   d. ka dalban kartaa xog-dhowre kasta inuu soo ogeysiiyo Hay'adda shuruudaha uu u cuskaday gudbinta xogta shakhsiyeed sida lagu tilmaamay faqradda 1-aad;
   e. Haddii ay hay'addu samayso ama aysan sameynin wax xeer ah ama hagitaan ah ama go'aan ah si waafaqsan faqradda 4(a) ama (b), taasi ma saamaynayso inuu xog-dhowraha u hoggaansamo faqradda 1-aad;

Qodobka 31aad: Ka Gudbinta Xudduudaha Marka Aysan Jirin Ilaalin Ku Habboon

1. Haddii aan midna la helin shuruudaha ku xusan qodobka 30(1)(a), (b) ama (c), wali xog-dhowraha waxa uu u wareejin karaa xogta shakhsiga ah dal ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama urur caalami ah haddii:
   a. qofka xogta leh bixiyay oggolaanshihiisa uusana dib uga noqon, kadib markii lagu wargeliyay cawaaqibka suurtagalka ah ee ka dhalan karta wareejintaas sabab la xiriirta in aanay jirin ilaalin ku filan;

b. adeegsigu uu lagama maarmaan u yahay gelidda ama fulinta heshiis dan u ah qofka xogta leh;

c. wareejintu waxay lagama maarmaan u tahay gelidda ama fulinta heshiis dan u ah qofka xogta leh, oo u dhaxeeya maamulaha xogta iyo dhinac saddexaad; ama

d. wareejintu waxay faa'iido ugu jirtaa qofka xogta leh, haddana:

   i. suurtagal ma ahan in la helo ogolaanshaha qofka xogta leh; iyo

   ii. Haddii qofka xogta leh la weydiin lahaa oggolaanshihiisa siday u badan tahay wuu bixin lahaa.

2. Haddii u gudbinta xogta shaqsiga dal ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama hay'ad caalami ah lagu saleyn karin qodobbada 30-aad ama 31(1), wareejintu waxay dhici kartaa oo keliya haddii:

   a. wareejintu aysan soo noq-noqoneyn;

   b. Wareejintu waxay khusaysaa keliya tiro kooban oo dadka xogta leh ah;

   c. Wareejintu waxay lagama maarmaan u tahay ujeedooyin muhiim ah, sharcigana waafaqsan oo dan u ah xog-dhowraha sidoo kalena aan ku xad-gudbeyn danaha ama xuquuqda iyo xorriyaadka qofka xogta leh; iyo

   d. Xog-dhowraha xogta waxa uu qiimeyn ku sameeyay dhammaan duruufaha ku xeeran wareejinta, waxa uuna ogaaday in la helayo ilaalin ku filan illaa heer dhowrista xogta.

3. Haddii wareejinta lagu sameeyo faqradda 2-aad, maamulaha xogta waa inuu:

   a. ku wargeliyaa wareejinta Hay'adda; iyo

   b. Ku wargeliyaa wareejinta dadka xogta leh si waafaqsan qodobka 18-aad, una sheegaaya danaha muhiimka ah ee uu u cuskaday.

CUTUBKA 7AAD: DIIWAANGELINTA IYO KHIDMADAHA

Qodobka 32aad: Diiwaangelinta Maamulayaasha Xogta Ee Muhiimka Ah

1. Dhammaan xog-dhowrayaasha muhiimka ah waa inay iska diiwaan geliyaan Hay'adda muddo lix bilood gudahood, kaddib markii ay buuxiyaan shuruudaha xog-maamulayaasha muhiimka ah ee ku xusan Sharcigan.

2. Marka la sameynayo diiwaangelinta ku xusan faqradda sare, waa in xog-dhowraha muhiimka ah uu Hay'adda ogeysiiyaa:
    a. magaciisa iyo cinwaankiisa, iyo sidoo kale magaca iyo macluumaadka xiriirka ee masuulkiisa ilaalinta xogta (Sarkaalka Xog-dhowrista)
    b. sharraxaad ku saabsan xogta shakhsiga ah ee ka dhigeysa xog-dhowre muhiim ah;
    c. qaybaha iyo tirada guud ay yihiin dadka xogta shakhsiyeed la xiriirto;
    d. ujeedooyinka uu ka leeyahay xogta shakhsiga ah ama uu u adeegsado;
    e. qaybaha xog-qaatayaasha uu la wadaago ama la wadaagayo xogta shakhsiga ah;
    f. Hay'ad kasta oo caalami ah ama dal kasta oo ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu xogta shakhsiga ah u gudbiyay ama uu doonayo inuu u gudbiyo;
    g. Sharaxaad guud oo ku aaddan khataraha, ilaalinnada iyo tallaabooyinka amniga iyo hababka uu ku xaqiijiyo dhowrista xogta shakhsiga ah; iyo
    h. Macluumaad kasta oo kale oo ay uga baahan tahay Hay'adda.
3. Xog-dhowraha xogta ee muhiimka ah waa inuu cusbooneysiiyaa diiwaangelintiisa sannad kasta.
4. Hay'addu waxa ay u tixgelinaysaa kuna daabaceysaa mareegaheeda Internet-ka liiska xog-dhowrayaasha Xogta ee muhiimka ah ee sida saxda ah ugu diiwaangashan, si waafaqsan Qodobkan.
5. Maareeyaha Hay'adda waxa uu xeer-hoosaadka kaga reebi karaa qayb kamid ah maamulayaasha xogta ee muhiimka ah shardiga diiwaangelinta ee ku xusan qodobkan, haddii uu u arko inaan loo baahneyn ama ay ka miisaan culus yihiin tixgelinta danta guud.
6. Maamulaha Xogta ee muhiimka ah looma qaadan karo inuu yahay 'xog-dhowre muhiim ah' oo loogu baahan yahay inuu fuliyo ujeeddooyinka faqradda 1-aad illaa laga gaaro taariikhda Sharcigan uu dhaqan galayo.

Qodobka 33aad: Khidmadaha Iyo Canshuuraha

1. Maareeyaha waxa uu xeer-hoosaadka ku sheegi karaa khidmadaha sannadlaha ah ama canshuuraha ay bixinayaan xog-dhowrayaasha muhiimka ah si ay udaboolaan kharashaadka Hay'adda ee ku xusan Sharcigan.

2. Heerarka khidmadaha iyo canshuuruhu way kala duwanaan karaan iyadoo loo eegayo nooca ama cabbirka xog-dhowrayaasha muhiimka ah.
3. Xukuumadda, hay'adaha dowladda iyo hay'ad kasta oo kale oo ay xukuumaddu magacowdo si ay u qabato hawlo guud, laguma qaadi karo khidmadaha iyo canshuuraha sanadlaha ah ee ku xusan faqradda 1-aad.

Qodobka 34aad: Magacaabidda Saraakiisha Xog Dhowrista

1. Maamulaha xogta ee muhiimka ah waa inuu magacaabaa Sarkaalka Xog-dhowrista' kaas oo aqoon iyo khibrad u leh Sharciga Xog Dhowrista, iyo sidoo kale habka iyo kartida loo fuliyo hawlaha ku xusan faqradda 3-aad.
2. Sarkaalka xog dhowrista waxa uu noqon karaa shaqaale ama uu qandaraasle adeeg.
3. Sarkaalka xog dhowrista xogta waxa uu leeyahay hawlaha soo socda:
    a. inuu kala taliyo xog-dhowraha waajibaadkiisa ka saaran Sharcigan;
    b. Inuu kormeero u hoggaansanaanta maamulaha xogta ee Sharcigan iyo siyaasadihiisa ilaalinta xogta.
    c. Inuu noqdo bar-xiriirka Hay'adda ee arrimaha la xiriira adeegsiga xogta shakhiga ah ee Xog-dhowraha.

CUTUBKA 8AAD: FULINTA

Qodobka 35aad: Cabashooyinka

1. Qofka xogta leh ee waxyeello kasoo gaartay falka ama fal la'aanta maamulaha xogta, kana dhalatay xadgudub ka dhan ah Sharcigan ama xeerar maamul ama xeer-hoosaadyo ama amarro dhaqangal ah waxa uu cabasho u gudbisan karaa Hay'adda.
2. Hay'addu waa inay qabataa cabasho kasta oo loo soo gudbiyo marka ay ula muuqato:
    a. In cabtuhu uu dan ku leeyahay mowduuca ay cabashadu la xiriirto; iyo
    b. In cabashadu aysan aheyn mid dhayal ah ama collaadeysi ku saleysan.

3. Hay'addu waxay sameeneysaa qeyb ama waax qabata oo la macaamisha cabashooyinka ay keenaan dadka xogta leh, sidoo kalena baaris ku sameysa.

Qodobka 36aad: Baaritaannada

1. Hay'addu waxay billaabi kartaa baaris ku saabsan cabashada loo soo gudbiyay ama si iskeeda ah marka ay jirto asbaab macquul ah oo tilmaameysa in xog-dhowraha uu ku xadgudbay ama ay u badan tahay inuu ku xadgudbo Sharcigan, ama xeer-maamul, ama xeer-hoosaad ama amarro lagu soo saaray sharcigan.
2. Hay'addu waxay ku amri kartaa qof kasta, ujeeddooyin baarisced darteed –
    a. inuu yimaado meel gaar ah waqti cayiman si wax loogu weydiiyo arrin ku saabsan cabasho;
    b. inuu keeno dukumintiga, diiwaanka ama qoraalka loogu baahan karo arrin kasta oo baarista la xiriirta, kaas oo aan qofku ka hor istaageyn sharci kale inuu shaaciyo; ama
    c. Inuu keeno bayaan qoraal ah oo uu ku sameeyay dhaar ama xaqiijin tibaaxeysa dhammaan macluumaadka loo baahan karo si waafaqsan amarka.
3. Marka sheyga baaristu la xiriirto ay ku jirto macluumaad lagu keydiyay qalab makaanik ama elegtaroonig ah, Hay'addu waxay ka dalban kartaa qofka inuu soo saaro ama oggolaado in la galo qalabkaas qaab la arki karo oo u habeysan, luqad la fahmi karo iyo format la akhrin karo.

Qodobka 37aad: Ammaradda Hay'adda

1. Haddii ay Hay'adda ku qanacdo, kadib marka ay soo gabagabeyso baarista si waafaqsan qodobka 36-aad, in xog-maamulaha uu jabiyay qodob kamid ah Sharcigan, xeer maamul, xeer-hoosaad ama xeer kale oo lagu soo saaray Sharcigan, waxa ay samayn kartaa amar kasta oo ku habboon, kaas oo xog-maamulaha ku farayso:
    a. inuu ka joogsado ama ka leexdo sameynta fal ka hor-imaanaya Sharcigan, oo ay kamid tahay inuu ka joogsado adeegsiga mowduuca Amarka;
    b. inuu qaado tallaabo macquul ah uu uga joojinayo xog-adeegsade isticmaalka xogta, si loo hubiyo u hoggaansanaanta sharcigan;

c. inuu magdhow ka bixiyo uuna saxo xadgudubka;
d. inuu magdhow siiyo qofka xogta leh ee ay gaartay dhibaatada, khasaaraha ama dhaawaca ka dhashay xadgudubka;
e. inuu dib u celiyo faa'iidada uu ka sameeyay falka xadgudubka; ama
f. Inuu bixiyo ganaax maamul oo gaaraya illaa [hal milyan oo dollar] ama qiimo u dhigma oo lacagta Soomaaliga ah.

2. Amar kasta oo ay soo saarto Hay'addu si waafaqsan faqradda 1-aad waa inuu noqdaa mid ku habboon, oo tixgelinaya:
   a. culayska xadgudubka iyo dabiicaddiisa soo noqnoqasho;
   b. dadaalka uu ku bixiyay xog-maamulaha inuu u hoggaansamo, uuna macluumaad siiyo Hay'adda iyo dadka xogta leh; iyo
   c. Waxyeelada iyo khatarta gaartay xuquuqda iyo xorriyadaha dadka xogta leh.

Qodobka 38aad: U Hogaansamid La'aanta Amarka Hay'adda

1. Maamulaha xogta ee aan u hoggaansamin amarka Hay'adda ee lagu sameeyay si waafaqsan qodobka 37-aad ee Sharcigan, aana aheyn racfaan uu ka qaatay sida ku cad qodobka 39-aad, waxa uu galayaa fal-dambiyeed uu ku muteysan karo ganaax illaa [hal milyan oo dollar] ah ama qiimo udhigma lacagta Soomaaliga iyo xarig [laba] sano ah.
2. Masuuliyada ganaaxa ee ku xusan faqradda 1-aad ma baajineyso ama hoos uma dhigeyso masuuliyad kasta oo kale oo ka dhalaneysay amarka lagu sameeyay si waafaqsan qodobka 37-aad.

Qodobka 39aad: Racfaan Ka Qaadashada Amarka Hay'adda

Waxaa u bannaan qofka xogta leh, maamulaha xogta ama qofka kale ee danta ku leh mowduuca cabashada ee aan ku qancin go'aanka Hay'adda, inuu u gudbisto Maxkamadda Sare dib-u-eegis garsoor muddo soddon [30] maalmood gudahood, kadib marka amarka lasoo saaray.

Qodobka 40aad: Magdhow Madani ah

Qofka xogta leh ee waxyeellada, dhibaatada ama khasaaraha kasoo gaartay xog-dhowraha ku xad-gudbay Sharcigan, ama Shirkadda Macaamiil ee wakiilka ka qof ama dad badan oo xog leh, waxa ay dacwad madani ah ka furan karaan maxkamadda ikhtisaaska uleh si ay u dalbadaan magdhow madani ah.

CUTUBKA 9AAD: QODOBBO QUBANE AH

Qodobka 41aad: Awoodda Soo Saarista Xeer-Hoosaad

1. Hay'adu waxay awood u leedahay inay soo saarto xeer-hoosaad lagu faafinayo Faafinta Rasmiga ah kaas oo sharaxaad ka bixinaya qodobada Sharcigan.
2. Iyadoo waxba loo dhimayn faqradda 1-aad, xeer-hoosaadku waxa uu dhigi karaa:
   a. Maamulka maaliyadeed ee arrimaha Hay'adda;
   b. ilaalinta xogta shakhsiga ah iyo dadka xogta leh;
   c. Habka ay Hay'addu u isticmaaleyso awoodaheeda, ama ay u fulineyso hawlaheeda ama u gudaneyso waajibaadkeeda ku xusan Sharcigan;
   d. Arrin kasta oo xeerkan kamid ah oo loo baahan yahay in xeer-hoosaad lagu qeexo;
   e. Arrin kasta oo Hay'addu u araktoo inay lagama maarmaan u tahay ama ku habboon tahay habsamida fulinta ujeeddooyinka Sharcigan.

Qodobka 42aad: Burin

Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la jaanqaadi Karin Sharcigan waa la baabi'iyey.

Qodobka 43aad: Dhaqan-galka

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

SHARCI LR.006

TAARIIKH: 20 Maarso 2023

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 APR 2023
BY: Uban Xasan Cilmi
SAACAD SAXIIX

OGOLAANSHO ANSIXINTA SHARCIGA SOCDAALKA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0250/B11/23**, ku taariikheysan **19/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Socdaalka Soomaaliya.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN - 034 - 23
TAARIIKH: 01/04/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE SHARCIYEEDKA SOCDAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
09 MAR 2023
SOO GELID/RECEIVED

CUTUBKA 1AAD:
QODOBBO GUUD IYO KAALINTA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA

Qodobka 1aad:
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Socdaalka Soomaaliya (Somali Immigration Law).

Qodobka 2aad:
Ujeeddada Sharciga

Sharcigan waxaa lagu nidaaminayaa hab-raacyada khuseeya socdaalka Soomaaliyeed sida soo gelidda, maridda (Transit) ka bixidda, joogista iyo degista Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS)

Qodobka 3aad:
Erey-bixin

Haddii aan Sharcigan dhexdiisa si kale loogu sheegin, ereyadan soo socda waxaa midkasta lagu qeexayaa micnaha ku hor qoran;

1) **Wasiir:** Waxa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS.
2) **Wasaarad:** Waxa loola Jeeda Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS.
3) **Muwaadin:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo Soomaali ah, si waafaqsan Qodobbada Dastuurka JFS iyo Sharciyada kale ee lagu caddeeyo muwaadinnimada iyo jinsiyadda Soomaaliya;
4) **Ajnabi:** waxaa loola jeedaa qof aan muwaadin Soomaali ahayn;
5) **Ajnabi aan raalli laga ahayn:** waxaa loola jeedaa qofka ay tilmaamayaan Qodobbada 38aad & 39aad ee Sharcigan;
6) **XJFS:** waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
7) **JFS:** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
8) **HSJS:** waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed;
9) Hay'adda: waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo heer Federaal ah;
10) **Qaxooti:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay qaxootinnimo u qeexayayaan Sharciyada dalka iyo Axdiga Caalamiga ah ee Jineefa ee 1951 (Geneva Convention 1951) ee la xariirta xaaladaha qaxootiga;
11) **Agaasime Guud:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed;
12) **Sarkaal Socdaal:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ah hawl-wadeen ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda si waafaqsan Sharciagan;

13) **Baasaboor:** waxaa loo la jeedaa dukumenti socdaal oo rasmi ah oo uu si sharci ah dal u sameeyo, dalna looga baxo, dal kalena lagu galo, lana aqoonsan yahay oo oggolaansho la saari karo;
14) **Uqaybsane**: waxaa loo la jeedaa sarkaal ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda ay u idmatay in uu ka hawl-galo safaarad ama qunsuliyad dalka dibeddiisa ah oo ay leedahay JFS;
15) **Amar Masaafurin:** waxaa loola jeedaa amar lagu soo saaro in qof uu ka baxo dalka JFS;
16) **Bar-xudduudeed:** waxaa loola jeedaa goob kasta oo loo asteeyey in si sharci ah laga soo galo dalka, loogana baxo, isla markaana uu ka furan yahay Xafiis Socdaal (Immigration Office) sida; dhulka, cirka iyo badda, halkaas oo suurto-gelinaysa in laga helo dhammaan adeegyada lama-huraanka u ah Socdaalka;
17) **Dal-ku-gal: (Entry Visa):** waxaa loola jeedaa oggolaansho dal-ku-gal sharci ah oo la siiyo qof ajanabi ah ama wata Baasaboor ajanabi ah;
18) **Dal-ku-joog**: waxaa loola jeeda oggolaansho dal-ku-joog sharci ah oo la siiyo qof ajanabi ah oo gudaha dalka joogaya, marka laga reebo muwaadin Soomaali ah oo wata Baasaboor ajnabi ah;
19) **Degganaansho:** waxaa loola jeedaa oggolaansho deegaan rasmi ah oo la siiyo qof ajanabi ah oo si rasmi ah dalka u deggan.
20) **Buug Bad-maax:** waxaa loola jeedaa dukumenti aqoonsi oo ay isticmaalaan bad-maaxiinta oo aduunka laga aqoonsan yahay;
21) **Baasaboor Dawlad**: waxaa loola jeedaa baasaboorka Shaqaalaha Dowladda (service passport) iyo midka Diblomaasiga ah oo labaduba loo bixiyo Safar shaqo-dawladeed.
22) **Gaadiidka Badda:** waxaa loola jeedaa gaadiid kasta oo lagula safro biyaha dushooda sida bad, Webi, Haro IWM.
23) **Ka-ganacsi dad:** waxaa loola jeedaa qof ama dad si sharci darro ah looga faa'iidaysto;
24) **Tahriibin:** waxaa loola jeedaa Socdaal Sharci darro ah oo dad la galiyo;
25) **Dal-laawe:** waxaa loola jeedaa qof aan dal lahayn.
26) **Qof:** Waxaa loola jeedaa Sharcigaan gudihiisa qof leh shakhsiyad qaanuun
27) **Magangelyo-doon:** Waxaa loola jeedaa qof kasoo dalbaday Dowladda Soomaaliya ogolaansho daljoog ah arrimo la xiriira amnigiisa, diintiisa iyo jinsiyadiisa darteed si waafaqsan Heshiiska caalamiga ee Geneva 1951.
28) **Xeer-nidaamiye:** waxa loola jeeda xeer ay hay'addu soo saartay oo ku nidaaminayso arimaha socdaalka .

Qodobka 4aad:
Baaxadda Sharciga

Sharcigan waxaa keliya oo lagu maamulayaa hawlaha socdaalka ee ay qabato HSJS oo ah Hay'adda leh awood sharci fulineed, mid maamul ee arrimaha socdaalka iyo bixinta dukumentiyada safarka iyo hubintooda, si waafaqasan Sharcigan, Sharciga HSJS iyo Sharciyada kale ee dalka.

CUTUBKA 2aad:
KAALINTA HAY'ADDA
Qodobka 5aad:
Ujeeddooyinka Sharcigan

Ujeeddooyinka Hay'adda ee arrimaha socdaalka waa sida soo socota:

1) Gudashada waajibaadkeeda shaqo si waafaqsan Dastuurka JFS, Sharcigan iyo shuruucda kale ee Dalka JFS.
2) Meel-marinta iyo dhowrista xuquuqda aadanaha marka ay fulinayso hawlaheeda la xariira socdaalka, iyadoo la dhawrayo hadafka iyo ujeeddooyinka sharcigan, sharciyada kale ee dalka iyo xeerarka caalamiga ah.
3) Maamulka xudduudaha ee la xiriira dhammaan dadka soo gelaya ama ka baxaya dhulka JFS.
4) Bixinta iyo baabi'inta dal-ku-gal, joogitaan ku-meel-gaar ah iyo mid rasmi ah oo la siinayo ajaanibta soo galeysa ama joogeysa dhulka JFS iyo musaafurinta ajaanibta aan raaliga laga ahayn.
5) Bixinta dukumintiyada Safarka muwaadiniinta Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan.
6) Isku-xirka, nidaaminta iyo hagidda wixii socdaal ku saabsan hay'adaha dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ee ka hawl-gala bar-xuduudeedyada dalka ee leh mas'uuliyadaha kala duwan.

Qodobka 6aad:
Hab-Raaca Iyo Mas'uuliyadda Bixinta Oggolaanshaha Dal-Ku-Galka, Dal-Ku- Joogista Iyo Degista

1) Bixinta iyo baab'inta oggolaanshaha dal-ku-galka, dal-ku-joogista iyo degista dhulka JFS, waxaa mas'uul ka ah HSJS, iyadoo raacaysa hab-raacyada ku cad Sharcigan iyo Sharciyada kale ee dalka.
2) Safaaradaha JFS ee dalka dibeddiisa, marka ajaanibtu ay ka dalbadaan oggolaansho dal-ku-gal (Entry Visa) waxay ka qabanayaan codsiyadooda iyo dukumentiyada looga baahanyahay si dhameystiran, waxayna u soo gudbinayaan Hay'adda.
3) Hay'addu marka ay hesho codsiyada iyo dukumentiyada Safaaradaha ka yimid oo ay oggolaato, kadib safaaraduhu waxay bixinayaan dalk-ku-galka.

Cutubka 3aad:
U-Socdaalidda Soomaaliya
Qodobka 7aad:
Waajibaadka Saraakiisha Socdaalka

Waajibaadka saraakiisha socdaalka ee Hay'adda waxaa ka mid ah hawlaha soo socda;

1) Maamulidda iyo fulinta arrimaha la xirriira soo-gelidda, joogista iyo degista dhulka JFS.
2) Xaqiijinta tilmaamaha ku qeexan sharcigan, hab-raaca iyo xeerarka lagu fulinayo iyo shuruucda kale ee dalka oo ku waajibinaya in uu raaco qofka ajnabiga ah ee doonaya in uu soo galo, ka baxo ama ku sugnaado dhulka Soomaaliya.

3) Hubinta dukumentiyada safarka ee qof kasta oo doonaya in uu soo galo ama ka baxo Soomaaliya ama qof kasta oo loo haysto sababo muujin kara in uu ku xad-gudbay Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha lagu meel-marinayo, iyo sidoo kale wareysiga qof kasta oo ay ula muuqato in uu xog ka hayo tuhunka xad-gudubyadaas.
4) Hubinta dukumentiyada cadeynaya ka bad-qabka cudurada faafa ka hor inta aan la siin ogolaansha dal-ku-galka.
5) Ka-qaadista sawirrada, xogta gaarka ah (biometric) iyo macluumaadka kale ee lagama maarmaanka u ah soo galidda.
6) Hakinta, haynta iyo dib-u-celinta qof kasta oo ku soo galaya ama uga baxaya dhulka JFS hab sharci darro ah iyo ka qaadista tallaabada sharci ee ku habboon, sida ku cad Qodobadda Sharcigan iyo Sharciyada kale ee dalka.
7) Muwaadin kasta oo soomaali ah oo sifo sharci ah ku safraya ama kusoo galaya dhulka JFS lama hakin karo ayadoon oggolaansho laga haysan maxkamad.

Qodobka 8aad:
Dembiyada ay geystaan Saraakiisha Socdaalka

1) Qof kasta oo ka mid ah saraakiisha ama hawl-wadeennada hay'adda wuxuu galayaa dembi ay ka dhalan karto ciqaab, ganaax ama tallaabo anshax-marin, iyadoo loo tixraacayo sharciyada ay khuseyso, haddii uu geysto;
   a) Fududeynta safar sharci-darro ah;
   b) Sii-deynta qof amar xayiraadeed ka yaal ama la saaray;
   c) Qarinta xog la xirriirta fal-dembiyeed dhacay ama arrin aan dembi ahayn oo dembi looga dhigo qof safraya, isagoo ka-faa'iideysanaya awoodda hay'addu siisay;
   d) Ku-tallaabsiga musuq-maasuq iyo anshax-xumo lid ku ah Sharcigan, sharciyada kalee dalka iyo hab-raacyada iyo siyaasadaha gaarka ah ee hay'adda.
2) Mar kasta waxaa ka mamnuuc ah saraakiisha socdaalka ee hay'adda geysashada ama ku kicidda dembiyada kale ee ku cad Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo sharciyada kale ee dalka inta ay ku guda jiraan gudashada wajibaadka hay'adda.

Qodobka 9aad:
Awoodaha Saraakiisha Socdaalka

Awoodaha Saraakiisha Socdaalka ay leeyihiin waxaa ka mid ah:
1) Baaritaanka iyo hakinta, gaadiid-badeedka (markab/doon iwm), diyaaradaha iyo baabuur kasta oo ka baxaya ama soo gaartay dhulka JFS, haddii ay jirto sabab keeni karta in looga shakiyo ku-xad-gudubka Qodobbada Sharcigan iyo halbeegyada caalamiga ah ee khuseeya.
2) Qabashada qof kasta oo la helo isagoo dembi socdaal ku dhex jira ama laga shakiyo, iyadoo aan loo haysanin amar warqad qabasho (Warrant of Arrest) haddii baahi degdeg ahi ay jirto, taasoo ay sababtay warqadda qabashada oo aan la heli karin waqtigaas ama ay dhici karto haddii aan la qaban oo la haynin qofkaas ay sababi karto in aan dib dambe loo helin iyo in uu baxsado.

Qodobka 10aad:
Waajibnimada Hortagista Saraakiisha Socdaalka

1) Qof kasta oo soo gelaya ama ka baxaya dhulka JFS waa in uu hortagaa saraakiisha socdaalka ee hay'adda.
2) Saraakiisha socdaalku waxay hubinayaan dukumentiyada iyo hadallada qofka si ay u xaqiijiyaan in ay waafaqsan yihiin oggolaanshaha lagu soo gelayo ama looga baxayo dhulka Soomaaliya.
3) Waxaa waajib ku ah qof kasta oo ka soo gelaya dalka JFS goob aysan joogin saraakiisha socdaalka, in uu si degdeg ah ugu wargeliyo Sarkaalka ku sugan goobta ugu dhaw.
4) Haddii aysan suurto-gal noqon in qof ajnabi ah si degdeg ah u tago xafiiska socdaalka ee ugu dhaw meesha uu ku sugan yahay, waa in uu 24 saac gudahood ku tagaa xafiis ka mid ah Hay'adda.
5) Haddii ay dhacdo in qof ajanabi ah uu hortagi waayo xafiisyada hay'adda sida ku cad faqrada 4aad ee qodobkan wuxuu mudanayaa tallaabo ciqaab, ganaax, musaafurin ama xayiraad, iyadoo la tixgalinayo hadba muddada uu sharci-darrada ku joogay iyo arrinta uu dalka u soo galay.

CUTUBKA 4AAD:
SHURUUDAHA SOO-GELISTA, JOOGISTA & DEGISTA DHULKA JFS
Qodobka 11aad:
Bar-xudduudeedyada iyo Shuruudaha Soo-gelista Dhulka JFS

1) Astaameynta bar-xuduudeedyada dalka laga soo galo ama laga baxo waxaa lagu soo saarayaa laguna faahfaahinayaa Xeer-nidaamiye iyo hab-raac u gaar ah oo ay soo saarto Hay'addu, lagana ansixiyo Golaha Wasiiradda Xukuumadda JFS.
2) Sida ku cad Sharcigani bar-xudduudeedyada lagu tilmaamay faqradda (1) ee Qodobkan waxay ahaanayaan rugaha rasmiga ah ee laga soo galo lagana baxo ee dhulka JFS.
3) Rakaabka imaanaya ee soo galaya Soomaaliya waxaa laga doonayaa sida ku cad Sharcigani in ay ku buuxiyaan xog-tooda oo dhamaystiran Foomka Rakaabka ee yaala bar-xuduudyada ee ah irdaha laga soo galo dalka.
4) Booqashada gaaban ee ay isugu gudbaan bulshooyinka xudduudaha wada degan, way ka duwanaanayaan shuruucda lagu dhaqayo bar-xudduudeedyada, waxaana lagu soo saarayaa xeer-nidaamiye iyo hab-raac u gaar ah deegaan kasta.
5) Ajnabiga waxaa loo oggolaanayaa in uu soo galo am ka baxo dhulka JFS, haddii uu haysto:
    a) Baasaboor sax ah oo ugu yaraan waqtigiisa dhicitaan ay ka dhimantahay muddo Lix (6) bilood ah ama dukumenti kale oo safar oo sharci ah oo muujinayana in uu leeyahay qofka sita; iyo
    b) Oggolaansho (dal-ku-gal) sax ah oo lagu soo galo ama looga baxi karo dhulka JFS, si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 12aad:
Shuruudaha Oggolaanshaha Soo-gelitaanka iyo Joogitaanka

1) Si waafaqsan Sharcigan, qofka ajnabiga ah wuxuu soo geli karaa ama joogi karaa dhulka JFS, haddii uu haysto mid kamid ah oggolaanshiyadan soo socda:
   a) Oggolaansho dal-ku-gal dalxiis;
   b) Oggolaansho maritaan dal (transit);
   c) Oggolaansho dal-ku-gal waxbarasho ama cilmi-baaris;
   d) Oggolaansho dal-ku-gal sababo gaar ah;
   e) Oggolaansho joogitaan muddaysan;
   f) Oggolaansho dal-ku-gal soo-noqnoqasho aan xaddidnayn ah (Multiple Entry Visa);
   g) Oggolaansho deganaansho rasmi ah;
   h) Oggolaansho Caafimaad;
   i) Oggolaansho dal-ku-gal ganacsi; iyo
   j) Oggolaansho dal-ku-gal shaqo.
2) Oggolaanshaha lagu xusay faqrada (1) ee Qodobkaan, haddii la helo dalab ka yimaada codsadaha, waxaa bixinaya sarkaalka socdaalka ee awoodda u leh si waafaqsan Qodobka 7aad faqraddiisa (1) ee Sharcigan, waxaana loo soo saarayaa dukumenti ahaan ama dal-ku-gal caddeynaya nooca oggolaanshaha kaas oo sidoo kale lagu muujinayo dukumentiga safarka ee codsadaha.
3) Oggolaanshuhu wuxuu noqon karaa warqad, shaabbad ama dhejis (sticker) la saarayo dukumentiga safarka, hadba sida uu dhigayo hab-raaca bixinta oggolaanshaha, iyadoo shaabbadda iyo dhejisku ay muujinayaan mid ka mid ah noocayada oggolaanshaha ku qeexan Qodobkan 12aad (1) ee Sharcigan.

Qodobka 13aad:
Oggolaansho Dal-ku-gal Dalxiis

1) Oggolaansho dal-xiis waxaa la siin karaa ajnabiga doonaya in uu dhulka Soomaaliya u yimaado:
   a) Ujeeddooyin dalxiis; ama
   b) Sabab kasta oo leh dabeecad muddeysan, taasoo ula muuqata Hay'adda socdaalka mid u qalanta in lagu siiyo oggolaansho soo-gelid dal-xiis.
2) Bixinta oggolaansho dal-xiis waxaa shuruud looga dhigayaa haysashada tikit (ticket) laabasho iyo mid muujinaya in qofku uu dal kale u sii gudbayo ama dammaanad ballan-qaadaysa kharashaadka inta lagu gudo jiro muddada joogitaanka Soomaaliya ee uu codsaduhu weydiistay.
3) Marka oggolaansho soo-gelid dalxiis aysan si cad u sheegayn xaalado gaar ah oo ku aaddan soo-gelidda iyo joogidda dhulka JFS, muddada joogidda kama dheeraan karto saddex (3) bilood oo ka bilaabanaysa taariikhda soo-gelidda.
4) Iyadoo la tixgelinayo codsiga qofka doonaya in uu dheeraysto muddada oggolaanshaha dal-xiiska, waxaa loo kordhin karaa Labo (2) mar muddada joogitaanka, isagoo halkii marba loo kordhin karo muddo u dhiganta Saddex (3) bilood.





Qodobka 14aad:
Oggolaansho dal-ku-gal Maritaanka Dalka

1) Oggolaansho maritaanka dalka (transit) waa la siin karaa qof ajnabi ah, haddii:
   a) Ujeeddada uu Soomaaliya u yimid ay tahay in uu uga sii gudbo meel kale oo uu usocdo, taasoo ka baxsan dhulka JFS; iyo
   b) Uu wato dukumentiga saxda ah ee looga baahan yahay si uu u galo dalka uu u socdo;
2) Bixinta oggolaanshaha maritaanka dalka waxaa shuruud u ah haysashada Tikit (ticket) sax ah oo muujinaya dalka uu qofku u sii gudbayo ama qaab saxan oo uu safarka ku sii wadan karo; ama haysashada kharash dabooli kara baahida qofka ajnabiga ah.
3) Qofka ajanbiga ah, inta uu joogo dhulka JFS muddada maritaanka dalka, haddii aysan jirin wax ka baxsan awoodda qofka la siinayo kama badnaan karto Saddex (3) maalmoodah, laga bilaabo maalinta soo-gelitaankiisa.

Qodobka 15aad:
Oggolaanshaha dal-ku-gal Waxbarasho ama Cilmi-baaris

1) Oggolaanshaha dal-ku-galka waxbarasho ama cilmi-baaris, waxaa la siin karaa ajnabiga doonaya in uu u yimaado dhulka JFS, iyadoo ujeeddadiisu tahay in uu ku qaato tababarro ama ku biiro hay'ado waxbarasho, haddii ay hay'adahaasi yihiin kuwo ay aqoonsan tahayWasaaradda Waxbarashada, Xukuumadda JFS.
2) Bixinta Oggolaansho waxbarasho waxay ku xirnaan kartaa haysashada dammaanad-qaad xaqiijinaya in qofka shisheeyaha ah uu haysto awood dhaqaale oo muujineysa in uu isku filnaan karo inta uu ku sugan yahay dhulka JFS.
3) Oggolaanshaha ujeeddadiisu tahay waxbarasho wuxuu xaq u siinayaa ajnabiga in uu soogalo kuna sugnaado Soomaaliya, inta uu ku gudo-jiro muddada waxbarashadiisa, waxaana intaasi wehliya shuruudaha oggolaanshaha.

Qodobka 16aad:
Oggolaansho dal-ku-gal Sabab Gaar ah

Iyadoo lala tashanayo Wasaaradda Arrimaha Dibedda waxaa la siin karaa oggolaansho u imaatin sabab gaar ah shakhsiyaadka ay casuumtay Dawladda Soomaaliya ee ku imaanaya booqasho rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn ama ka-qeyb-gal shirar labo- geesood ah ama kuwa dalal badani ay qeyb ka yihiin.

Qodobka 17aad:
Oggolaansho dal-ku-gal Soo-noqnoqosho Aan Xaddidneyn

Oggolaanshaha soo-noq-noqoshada aan xaddidneyn waxaa codsan kara oo la siin karaa:
1) Ajnabi kasta oo dhulka JFS ku soo galay si sharci ah ugu yaraan labo jeer, ka hor intauusan dalban oggolaanshaha uu hadda kusoo galay.
2) In uu soo buuxiyo shuruudaha ku cad Qodobka 11aad faqrada (3) ee Sharcigan.
3) In uu helo dammaanad sharci ah, cinwaanka damiintaha iyo meesha uu ku soo degayo.

4) In uu caddeeyo sababta uu u qaadanayo oggolaanshaha soo noq-noqoshada oo faahfaahsan.
5) Ajnabiga kusoo gala dalka ogolaanshiyahan ee uu ku gaabato waqtiga waxaa loogu dari karaa illaa muddo Hal (1) bil ah, balse kuma soo noqon karo muddadaas loo kordhiyey haddii uu ka baxo dalka.

Qodobka 18aad:
Oggolaansho Joogitaan Muddeysan

1) Bixinta oggolaanshaha joogitaanka muddeysan waxaa la siin karaa Ajnabi kasta, marka laga reebo ajnabiga aan raalli laga ahayn haddii uu la yimaado arrimaha soo socdo:
   a) Marka uu yahay mid wata oggolaansho la aqbali karo oo waafaqsan Qodobka 12aad ee (1) ee Sharcigan; ama
   b) Haddii uu dammaanad kala yimaado qofka daneynaya ama qof kale, isla markaana sarkaalka hay'addu uu ku qanco dammaanaddaas.
2) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda wuxuu ka dhaafi karaa qofka ajnabiga ah ee codsanaya oggolaansho deganaansho joogitaanka muddeysan, shuruudaha ku xusan farqadda (1) (ii) ee Qodobkan, marka ay caddaato in ajnabigu haysto qaabab kale oo uu ku dabooli karo baahidiisa inta uu ku gudo-jiro joogitaanka loo oggolaaday ee dalka, sidoo kalena uu dabooli karo kharashka tikit-ka laabashada ama kharashka safarka dal kale.
3) Oggolaansho joogitaan kasta oo aan ahayn joogto (permanent), waa in ay si cad u tilmaantaa muddada qofka ajnabiga ah uu joogayo dalka. Haddii uusan qofka ajnabiga ahi haysan oggolaansho waafaqsan Qodobkan 12aad (sh) ee Sharcigan, kama qeyb geli karohawlo faa'iido laga helayo dalka gudihiisa.
4) Muddada oggolaanshaha joogitaanka muddeysan kama badnaan karto Hal (1) sano.
5) Qofka haysta oggolaanshaha joogitaan muddeysan wuxuu u hoggaansamayaa shuruudaha ku cad oggolaanshaha la siiyey.

Qodobka 19aad:
Oggolaansho Deganaansho Rasmi Ah

1) Oggolaansho deganaanshaha rasmi ah waxaa la siin karaa ajnabiga leh sumcad wanaagsan, isla markaana codsada oggolaansho, kaddib marka uu Soomaaliya ku joogay si sharci ah muddo aan ka yarayn Shan (5) sano oo xariir ah.
2) Faqradda (1) ee Qodobkan, waxaa lagu dhaqayaa labada qof ee is-qaba iyo caruurta ka yarsideed iyo toban (18) sano ee la nool qofka ajnabiga ah ee la siiyey oggolaanshaha deganaanashaha rasmiga ah.
3) Oggolaanshaha way dhacaysaa, haddii qofka la siiyey uu ka maqnaado dalka Soomaaliya muddo ka badan lix (6) bilood oo xariir ah.

Qodobka 20aad:
Oggolaansho Ganacsi

1) Oggolaanshahan waxaa la siin karaa ajaanibta doonaysa in ay ganacsi ama maal-gashi kasameeyaan dhulka JFS, waxaana lagu hawl-gelin karaa shuruudaha soo socda:
   a) In ajnabigu uu ganacsiga ku darso saami maaliyadeed ama raasu-maal;
   b) In qofka ajnabiga ah uu ballan-qaado in uu u hoggaansamayo shuruudaha ku cad Sharciga Maalgashiga Shisheeye Soomaaliya ee soo baxay 21/01/2016.
2) Ajnabiga haysta oggolaanshahan wuu ka ganacsan karaa dalka JFS, waana loo shaqeyn karaa, isagoo dhowraya sharciga shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo sharciyada kale ee dalka ee xiriirka la leh ganacsiga iyo arrimahiisa.

Qodobka 21aad:
Oggolaansho dal-ku-gal Shaqo

1) Oggolaanshahan waxaa la siinayaa ajaanibta ku imaanaya shaqo dhulka JFS, marka ay oggolaansho shaqo ku helaan si waafaqsan "Sharciga Shaqo-qorista Shaqaalaha Shisheeye ee soo baxay 09/11/2015.
2) Marka oggolaanshaha shaqada la siinayo qof ajnabi ah, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay tixgelinaysaa in muwaadin Soomaali ah uu qaban karo shaqadaas iyo in kale.
3) Waxaa reeban in shaqo uu qaban karo muwaadin Soomaaliyeed loo qoro qof ajnabi ah, waxaana hubinayo fulinta faqradan Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo kaashanayso Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.
4) Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo dhammaan hay'adaha kale ee dawladd, shirkadaha ama ganacsiga gaarka loo leeyahay ee ay khuseyso shaqada uu qabanayo qofka shisheeyaha ah waxaa xil ka saaran yahay la socodka shaqada uu qabanayo qofkaas ajnabiga ah.
5) Oggolaanshaha shaqada waxay caddeynaysaa in:
   a) Adeegga shaqo ee uu qofka ajnabiga ahi qabanayo; iyo
   b) Muddada uu sharci ahaan oggolaansho u haysto.

Qodobka 22aad:
Waajibaadka Saaran Qofka Ajanabigu u Shaqeynayo

Qofka Soomaaliga ah ama degan dhulka JFS ee uu u shaqeynayo qofka ajanabiga ah ee loo oggolaaday in uu soo galo dhulka JFS, waxaa laga rabaa;

1) In uu siiyo qofka ajnabiga ah shaqadii loo oggolaaday in uu qabto, iyadoo la tixgelinayo nooca oggolaanshaha shaqada.
2) In uu keeno marka laga dalbado qofka ajnabiga ah, aqoonsiga, macluumaadka iyo nuquladda heshiiska shaqada ajnabiga shaqaalaha ah.
3) In uu ogeysiiyo Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso marka qofka ajnabiga ah ay shaqadu ka dhammaato ama uu qabto shaqo ka duwan middii loo dalbaday.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

4) Marka shaqada uu dalka ka hayey qofka ajnabiga ah ay joogsato, sababta ay doonto ha noqotee, loo-shaqeeyaha waxaa looga baahan yahay in uu ogeysiiyo Wasaaradda Shaqadaiyo Arrimaha Bulshada, iyo Hay'adda muddo Shan iyo toban (15) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa taariikhda ay shaqadu ka dhammaatay ama laga saaray shaqada.

Qodobka 23aad:
Dammaanad

1) Dammaanadda uu tilmaamayo Qodobkan, waxaa bixin kara loo-shaqeeyaha doonaya in uu qofka ajnabiga ah siiyo shaqo uu ka qabanayo gudaha dhulka JFS.
2) Loo-shaqeeyaha waxaa laga dhigayaa "caddeyn qoraal ah", isagoo Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda u sameynaya dammaanad qoraal ah, in uu mas'uul ka yahay qofka ajnabigaah iyo in uu ku celinayo dalkiisa uuna daboolayo kharashaadkiisa.

Qodobka 24aad:
Cusbooneysiinta Dammaanadda

1) Marka joogitaan la siiyey qof ajnabi ah la cusbooneysiinayo, dammaanadda ku xiran iyo muddadii ay xaddiday Hay'adda ee ku cad qodobka 23aad ee sharcigan, iyadana dib ayaa loo cusbooneysiinayaa.
2) Haddii qofka loo-shaqeeyaha ah iyo qofka ajanabiga ah ku heshiiyaan shaqo ka beddelanmiddii hore iyo waqti ka dheer muddadii hore, iyadoo la tixgalinayo xaaladda is-beddelka,Hay'addu waxay dalban kartaa caddeymo iyo dhammaand dheeraad ah.

Qodobka 25aad:
Baabi'inta Dammaanadda

1) Haddii qof ajnabi ah oo la siiyey joogitaan dammaanad leh dhulka Soomaaliya, kadibna la siiyo deganaansho joogto ah dammaanaddii magaciisa lagu bixiyey way baaba'aysaa.
2) Haddii qofka ajnabiga ah la siiyey joogitaan ku xiran shuruud dammaanad leh oo uu si kama-dambeys ah uga baxayo dhulka JFS, isla markaana uu la yimaado kharashkii uu kubixi lahaa ee ku noqoshada dalkiisa, waxaa la baabi'inayaa dammaanaddii hore loogu sameeyey, waxaana la siinayaa wixii kale ee horay looga hayey, marka ay isku waafaqaan qofkii uu damaanadiisa dalka ku joogay.
3) Qofka ajnabiga ah oo dalka ku yimid shaqo damaanad leh, kama qaban karo dalka shaqokale inta ay jirto mudadii damaanadii hore loogu keenay, haddii uu raalli ka yahay qofkiiuu damaanadiisa dalka ku joogay in la soo gaabiyo muddadii joogitaankiisa waa la baa'inayaa joogitaankii iyo damaanaddii hore, dalka ayuuna ka baxayaa.

Qodobka 26aad:
Wax-ka-bedelka iyo kala-noqoshada Joogitaanka

1) Agaasimaha Guud ee Hay'adda, isagoo wargelinaya Wasiirka Amniga Guddaha, wuxuu awood u leeyahay in uu wax-ka-beddelo ama kala-noqdo oggolaanshe kasta oo

lagu soo saaray Sharcigan, marka ay yimaadaan xaaladaha soo socda, isagoo qaab qoraal ah ku muujinaya go'aankiisa:

a) Haddii qofka haysta oggolaanshaha ama wakiilkiisa uu bixiyey macluumaad khaldan,markii codsiga oggolaanshaha la soo gudbiyey ama oggolaanshaha lagu helay matalaad been ah, xog si ula-kac ah looga tegay ama la qariyo xog muhiim ah; iyo

b) Haddii qofka haysta oggolaanshaha uu ku guul-darreysto in uu dhawro mid ka mid ah shuruudaha ku cad oggolaansha ama qofka haysta oggolaansha uu ku lug yeeshay shaqo aan ahayn shaqadii lagu siiyey oggolaanshaha, isagoo aan haysan fasaxa Hay'adda ama kan Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada.

2) Wasiirka Amniga Gudaha wuxuu markasta baabi'in karaa oggolaansho soo-gelid ama midda deegaan ee la siiyey qof shisheeye ah, si waafaqsan Sharcigan, isagoo faraya Hay'adda, caddeynayana sababta keentay in la baabi'iyo oggolaanshaha qofka ajanabiga ah.

3) Haddii oggolaansho joogitaan lagala noqdo qofkii la siiyey, waxaa la soo saarayaa wargalin ku saabsan kala-noqoshadaas, si waafaqsan Sharcigan, wuxuuna noqonayaa sida soo socota:

a) Waxaa shakhsi ahaan lagu wargelinayaa go'aanka kala-noqoshada qofkii haystay oggolaanshaha; iyo

b) Sababaha kala-noqoshada keentay, taariikhda kala-noqoshadu ay dhaqan-gelayso, iyo waqtiga kama dambeysta ah ee ka bixitaankiisa dalka.

4) Haddii qofka ajnabiga ah ay ka dhamaato muddadii oggolaanshaha, waa in uu dalka kabaxaa marka uu dhiibo lacagta ay keentay mudadii uu dhacsanaa oggolaanshuhu, sida ku cad Qodobka 54aad ee Sharcigan.

5) Qofka ajnabiga ah waxaa kale oo lagala noqon karaa oggolaanshaha joogitaan ee dalka markii uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo ciqaab ah.

Qodobka 27aad:
Khidmada Oggolaanshaha Soo-gelista, Joogista iyo Degista Dalka JFS

1) Bixinta iyo cusbooneysiinta oggolaanshaha ku cad faqradaha kala duwan ee Qodobbada Sharcigan waxay ku xiran yihiin bixinta khidmadaha uu jaangoyntooda Sharci gaar ah kusoo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

2) Bixinta iyo cusbooneysiinta oggolaanshaha uu qeexayo Sharcigan waxaa shardi u ah in qofka loo soo saarayo oggolaanshaha uu bixiyo khidmadda ku waajibtay ee lagu soo saarayo oggolaanshaha.

Qodobka 28aad:
Ka-dhaafidda Khidmadaha oggolaanshaha dadka leh Mudnaanta iyo Xasaanadaha la Xiriira Heshiisyada Caalamiga ah

1) Qodobbada Sharcigan saameyn kuma yeelanayaan Heshiisyada Caalamiga ah oo ay qeybka tahay Dawladda Soomaaliya, kuwaas oo la xirrira ka dhaafidda khidmadaha

oggolaanshaha dadka leh mudnaanta, sharafta iyo xasaanadaha gaarka ah ee Dawladda Soomaali aqoonsan tahay.

2) Khidmadaha oggolaanshaha waxaa laga dhaafayaa dadka soo socda:
   a) Ajnabiga u yimaada dalka hawl diblomaasiyadeed marka ay ku soo galo sifo sharci ah, isla markaana ay oggolaatay Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Xukuumadda JFS;
   b) Ajnabiga heshiis toos a kula jooga Dowladdda Federaalka Soomaliya oo ay Dowladdu u igmatay qabashada shaqo muhim u ah dalka iyo
   c) Shaqaalaha rasmiga ah ee Qaramadda Midoobay (UN) ee haysta dukumentiga safar ee Qaramadda Midoobay.

CUTUBKA 5aad:
HABKA LOO RAACAYO DADKA SAARAN GAADIIDKA BADDA, DIYAARADAHA IYO BAABUURTA SOO GELAYSA AMA KA BAXAYSA DHULKA JFS

Qodobka 29aad:
Waajibaadka Bixinta Liiska (Manifest List) ee Rakaabka Saaran Gaadiidka Badda, Diyaaradaha Iyo Baabuurta Soo-gelaya Dhulka JFS

1) Qofka mas'uulka ka ah gaadiid bad, diyaarad ama Baabuur kasta ee soo galaya ama ka baxaya mid ka mid ah bar-xudduudeedyada dhulka JFS, waa in uu la wadaagaa SarkaalkaSocdaalka nuqul uu saxiixay qof awood u leh oo sheegaya ama caddeynaya magacyada rakaabka, xubnaha shaqaalaha iyo haddii ay jiraan dad kale oo saaran gaadiidka oo loo kala saaray darajooyinkooda shaqo, isla markaana uu bixiyo wixii macluumaad ah ee laga codsado.
2) Haddii aan la helin liiska rakaabka saaran gaadiidka ama ay soo baxdo khaladaad ku jira ama dad dheeraad ah oo gaadiidka saaran, waxaa la hakinayaa gaadiidkaas socodkiisa, iyadoo laga qaado tallaabo kale oo sharciga waafaqsan, sida ku cad Qodobka 31aad ee Sharcigan iyo si waafaqsan shuruucda caalamiga ah.

Qodobka 30aad:
Soo-gelid Ku-meel-gaar ah

Hawl-wadeennada Xafiisyada Socdaalka waxay awood u leeyihiin bixinta oggolaanshaha imaatinka dadka safarka ah ama shaqaalaha gaadiidka Badda, Diyaaradaha ama Baabuurka in ay si ku-meel-gaar ah dalka ku soo galaan, iyadoo la raacaya tilmaamaha ku faahfaahsan faqradaha kala duwan ee Qodobka 12aad ee Sharcigan,

Qodobka 31aad:
Ciqaabta Uu Mudanayo Milkiilaha, Wakiilka Ama Qofka Mas'uulka Ka Ah Gaadiidka Badda, Diyaaradaha Iyo Baabuurta

1) Marka ajnabi aan raali laga ahayn uu soo galo Dhulka Soomaaliya, isagoo ku yimid gaadiid Bad, Diyaarad ama Baabuur, iyadoo milkiilaha, wakiilka ama qofka mas'uulka kaah Gaadiidka Badda, Diyaaradda ama Baabuurka uusan ka war hayn, markaas oo

kale ajnabiga iyo milkiilaha, wakiilka ama qofka mus'uulka ka ah waxaa loo ciqaabayaa mid kasta si gaar ahaantiisa ah.

2) Haddii uusan falku keenayn fal-dembiyeed aad u culus, qofka waxaa lagu ganaaxayaa Lacag Shillin Soomaali u dhiganta "Kun illaa Saddex Kun doollarka Maraykanka" ($1,000 illaa $3,000) iyo qaraamaadka kale ee ku waajibay marka la xaqiijiyo muddadii uu dalka joogay.
3) Haddii uu yahay gaadiidku mid keenay qof ku sifaysan si sharciga aan waafaqsaneyn, sida diyaarad ama markab gaanaaxa la saarayo wuxuu noqonayaa ugu yaraan Shillin Soomaaliu dhigma "Saddex Kun illaa Shan iyo Toban Kun Doollarka Mareykanka" ($3,000-$15,000). waxaana lagu qeexayaa xeer-nidamiyaha lagu dhaq-galinayo Sharcigan.
4) Xukunka ku xusan Faqradda (2) ee Qodobkan, laguma dhaqayo marka ajanabigaas aan raaliga laga ahayn uu haysto oggolaansho sax ah oo lagu bixiyey si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 32aad:
Maxkamadda Awoodda U Leh Xayiraadda Gaadiidka Badda, Diyaaradaha Iyo Baabuurta

1) Haddii ajnabi aan raalli laga ahayn uu soo galo dhulka Soomaaliya, Maxkamadda awoodda u leh waxay go'aamin kartaa sii haynta ama sii deynta markabka, diyaaradda ama baabuurkii lagu keenay dalka qofkaas ajnabiga ah la xayiro illaa iyo inta milkiilaha, wakiilka ama qofka mas'uulka ka ah uu fuliyo hab-raaca lagama maarmaanka u ah musaafurinta ajaanibta.
2) Haddii milkiilaha, wakiilka ama qofka mas'uulka ka ah la ganaaxay sida ku xusan Qodobka 32aad (3) ee sharcigan, Maxkamadda awoodda u leh waxay go'aamin kartaa sii haynta ama sii deynta gaadiidka badda, diyaaradda ama baabuurka la sii hayo illaa milkiilaha, wakiilka ama qofka mas'uulka ka ah uu ka bixinayo ganaaxa la saaray si waafaqsan Sharciga.

CUTUBKA 6aad:
WAAJIBAABKA AJAANIBTA IN AY SHEEGAAN CINWAANNADOODA

Qodobka 33aad:
Waajibaadka Ajaanibta Ka Saaran Sheegista Cinwaannadooda

Waxaa waajib ku ah ajaanibta joogta dhulka JFS in ay qoraal ahaan ugu wargeliyaan Saraakiisha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda halka ay degan yihiin ama wixii is-beddelah oo ku yimaada cinwaannadooda deegaan waqti kasta,

Qodobka 34aad:
Goobaha Dhulka ee Ka Reebban Ajaanibta

Wasiirka Amniga Gudaha wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga ama ciddii kale ee ay khuseyso in uu soo saaro qodobbo kareebaya qofka kasta oo ajnabi ah in uu galo soohdimo cayiman oo dalka Soomaaliya ka mid ah, iyadoo marka hore si guud loo shaacinayo goobahaas, waxaana sidaa loo yeelayaa sababo xagga amniga awgeed ah ama arrimo kale oo danta guud ee Qaranku ku jirto reebitaankooda.

Qodobka 35aad:
Shaqo-Ka-Joojinta Qofka Ajnabiga Ah

1) Oggolaanshaha shaqada ma sii jireyso haddii qofka ajnabiga ah uu ku jiro labadan xaaladood midkood:
   a) In uusan haynin shaqadii uu u qaatay oggolaanshaha; ama
   b) In uu ku lug yeesho shaqo ka duwan middii ku caddeyd oggolaanshaha shaqada.
2) Haddii qof ajnabi ah si lama filaan ah u soo gaba-gabeeyo shaqadiisa, waa in uu la socodsiiyaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, iyo Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed muddo todobo (7) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa maalinta ay shaqadu ka dhammaatay qofkaas.

Qodobka 36aad:
Ku-Ekaanshaha Ajaanibta Shaqadda Ay Dalka U Yimaadeen

1) Qof kasta oo ajnabi ah oo dalka loo keenay in uu qabto shaqo cayiman taasoo qof muwaadin Soomaaliyeed ah uusan lahayn aqoonteeda, waxaa ka reeban in uu qabto shaqo kale oo ka duwan middii loo keenay dalka.
2) Waxaa kale oo qofka ajnabiga ah ka reeban in uu iskiis u abuurto shaqo si madax-bannaan, sida haddii ay dhacdo in uu ku fakero in uu samaysto shirkad ama wax la mid ah oo uu si madax-bannaan uga hawlgaliyo dalka, waxaa ku waajib ah haddii uu rabo in uu si iskiis ah shaqo u abuurto:
   a) In uu ku wargalinayo joojinta shaqadiisii hore Xafiiska Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo HSJS ugu badnaan toddobo maalmood gudahood laga billaabo maalinta shaqadii uu yahay uu ka joogsaday; iyo
   b) In uu dalka ka baxo kana soo codsado oggolaansho dalka dibaddiisa, isagoo raacayo Faqradda (3) ee Qodobkan.
3) Qof kasta oo ajnabi ah oo doonayo in uu ka shaqeeyo dalka, waa in uu kasoo codsadaa Safaaradaha JFS ku leedahay dalka dibaddiisa, kadibna Safaaraduhu u soo gudbiyaan Hay'adda, oo iska leh oggolaashaha iyo diidmada dal-ku-galka iyagoo mid walba sababaynaysa.
4) Mar kasta oo Hay'adda Socdaalka ay soo gaaraan arrimaha ku xusan faqradaha (1, 2 iyo 3) ee Qodobkan, waa in lagu saleeyo go'aanka shuruucda khuseysa shaqadaas, sida sharciga maal-gashiga, sharciga shaqo-qorista shaqaalaha shisheeye iyo Sharcigan, lana hubiyaa haddii ay jireen xad-gudubyo la xariira shaqadiisii hore qofka ajanabiga ah.

Qodobka 37aad:
Ajnabiga Aan Raalli Laga Ahayn

1) Haddii ay dhacaan duruufaha soo socda, qofka ajnabiga ah waxaa loo aqoonsan karaa inuu yahay mid aan raalli laga ahayn, waxaana loo diidi karaa in uu dalka soo galo ama waxaa laga masaafurin karaa dalka si waafaqsan Sharciyada dalka.
   a) Haddii loo keeno amar masaafurin ah oo ka soo baxay Dawladda JFS, laguna soo saaray sida uu qabo Sharcigan ama sharci kale oo xilligaas dhaqan-gal ah;

b) Haddii uusan haysan dhaqaale ku filan noloshiisa;
c) Haddii uu ku lug yeesho ka-shaqeynta ama daabulidda maan-dooriye ama walxo kale oo shuruucda dalku mamnuuceen;
d) Haddii uu ku lug yeesho ama looga shakiyo si mug leh in uu ku lug leeyahay ka-ganacsiga dadka/tahriibinta ama ka-ganacsiga sharci-darrada ah ee xubnaha bani'aadamka;
e) Haddii uu ku lug yeesho ama looga shakiyo si mug leh in uu ku lug leeyahay keenista iyo ka ganacsiga hub ama rasaas sharci-darro ah;
f) Haddii saraakiisha caafimaadka dawladda ay xaqiijiyaan in qofka shisheeyaha ahi uuqabo cudur halis ku ah nolosha iyo fayo-qabka caafimaadka bulshada;
g) Haddii uu dhulka Jammuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo galay si sharci-darro ah, isagoo aan haysan dukumentiyada safarka ee saxda ah ama oggolaansho sida ku cad Qodobbada 11aad iyo 12aad Sharcigan;
h) Haddii uu yahay codsade hore looga diiday codsigiisa ah in loo aqoonsado qaxootinimo, iyadoo la eegayo Sharciyada dalka iyo Axdiga Jineefa (Geneva Convention) ee 1951;
i) Haddii joogitaanka qofka ama oggolaanshihiisu uu halis ku yahay nidaamka dadweynaha, amniga qaranka, danta guud, akhlaaqda ummadda & diinta.

2) Go'aanka ah in qof shisheeye ah uu yahay mid aan raalli laga ahayn waxaa lagu go'aaminayaa sida ku cad Faqradda (1) (b illaa sh) ee Qodobkan, marka laga reebo dadka dalka looga saaro go'aannada siyaasadeed.

Qodobka 38aad:
Waajibaadka Saraakiisha Socdaalka Ee Ku aadan Ajnabiga Aan Raalliga Laga Ahayn

1) Saraakiisha Socdaalka ee ka hawl-gala xarumaha kala duwan ee Hay'adda waxaa sharci ahaan ku waajib ah:
   a) In ay hakiyaan una gudbiyaan Booliska qof kasta oo ajnabi ah oo aan raalli laga ahayn, kaasoo lagu helay in uu ku xad-gudbay Sharcigan, isagoo ku sugan dhulka Soomaaliya, isla markaasna ay ku wargeliyaan Maxkamadda awoodda u leh, iyadoo la tixgelinayo hab-raacyada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee dalka oo xiriirka laleh arrintaas;
   b) In ay ka hor-istaagaan ajnabiga aan raalli laga ahayn in uu ka soo dego, gaadiidka badda, diyaarad, baabuur ama gaadiid kale oo ku sugan dhulka JFS ama lug ku soo galo, haddii uusan ahayn qof qaxootinimo doonaya; sama
   c) In ay u masaafuriyaan ajnabiga aan raalliga laga ahayn dalkii uu u dhashay ama dalkii uu safarkiisa u danbeeyey ka soo billaabay.
2) Qofka ajnabiga ah waa in uu dalka uga baxaa sida ugu dhaqsaha badan oo ah muddo aan ka badneyn todobo (7) maalmood, laga billaabo taariikhda lagu wargeliyey, haddii aan Maxkamadi ku xukumin muddo intaas ka duwan.
3) Muddada diyaarinta safarkiisa waxaa lagu haynayaa xabsiga ama haday jiraan goobo loo cayimay in lagu hayo dadka noocaas ah.

Qodobka 39aad:
Dadka La Masaafurinayo

1) Qofka ajnabiga ah waa laga saarayaa dalka, haddii Maxkamadda awoodda u leh ay amarto saaritaankiisa, muddo sharci ah oo cayiman gudaheed.
2) Ajnabiga ay go'aan siyaasadeed Dowladdu ku soo saarto in dalka laga saaro.
3) Ajnabiga ku xad-gud-guba sharciyadda dalka waxaa dalka looga saaraayaa goo'aanka Wasiirka Amniga Guddaha. Waxaa si qoraal ah lagu gaarsiinayaa qofka ajnabiga ah iyo dhinacyada ay khuseyso go'aanka kasoo baxa Wasiirka Amniga Gudaha ama hay'addii kale ee awood u leh oo tilmaamaya in uu yahay qof aan raalli laga ahayn.
4) Go'aanka soo baxay waa in uu wehliyaa amarka saaritaanka oo waqtigiisu cad yahay iyo sidoo kale hab-raaca loo marayo.
5) Qofka ajnabi ah ee lagu amray in uu ka baxo dhulka JFS, waa la sii hayn karaa haddii uusidaas oggolaado, inta laga dhammeystirayo hawlaha looga saarayo dalka, iyo sidoo kale haddii ay hay'adda ula muuqato in ajnabigaas baxsan karo ama carqalad kale geysan karo inta hawlihiisa laga dhameystirayo.

Qodobka 40aad:
Dhigista Curaar Si Loo Fuliyo Amarka Masaafurinta

1) Waxaa lagu amri karaa qofka ajnabiga ah ee laga saarayo dalka JFS in uu dhigo lacag curaar ah (deposit) oo ku filan kharashka lagu masaafurinayo ama lagu sii haynayo.
2) Sida ku cad faqradda (1) ee Qodobkan, wixii kasoo hara lacagta curaarta ah ee lagu masaafurinayo ama lagu sii haynayo qofka ajnabiga ah, waxaa dib loogu celinayaa isla isaga marka uu dhoofayo ama ka gudbo bar-xuduudeedka dhulka JFS.
3) Haddii qofka ajnabiga ah uusan haysan kharash ku filan oo lagu masaafuriyo, waxaa kharashka masaaafurintiisa ku baxaya bixinaya wakiilka qofka ajnabiga ah ee dalka soo galiyay.
4) Muddada laga mamnuucayo waddanka ajnabiga la masaafuriyey in uu dib ugu soo laabto,kama yaraan karto muddo Lix (6) bilood ah, haddii aysan Maxkamadi xaddidin waqti ka duwan.
5) Masaafurinta ka dhalata dembiyadda la xariira dhinaca socdaalka waxaa fulinaya HSJS, iyadoo la raacayo go'aanka ay gaartay maxkamadda awoodda u leh ama Wasiirka AmnigaGudaha.

Qodobka 41aad:
Ka-noqoshada Amarka Masaafurinta

Wasiirka Amniga Gudaha wuxuu awood u leeyahay in uu ka dhaafo amarka masaafurintaee ka dhanka ah qofka ajnabiga ah, -haddii aysan Maxkamadi xukumin musaafirintiisa , si waafaqsan Sharcigan, isagoo sababaynaya.

CUTUBKA 7aad:
TODOBAAD: KA SOCDAALIDDA SOOMAALIYA
Qodobka 42aad:
Dukumentiyada Safarka

Noocyada baasaboorada iyo dukumentiyada Safarka, sida uu qabo Xeerka Baasaboorka, waxaa kamid ah:

1) Baasaboorka caadiga ah (ordinary passport) ee lagu soo saaro codsiga muwaadin si uu ugu safro;
2) Baasaboorka shaqaalaha (service passport) oo lagu soo saaro codsiga Shaqaalaha Dawladda iyo oggolaanshaha hay'adaha ay khuseyso.
3) Baasaboor diblomaasi ah (diplomacy passport) oo loo soo saaro qof dalka JFS ka haya xil sare Sida:
    a) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Madaxwaynayaashii hore ee JFS;
    b) Xubnaha Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Xaasaskooda & Caruurtooda iyo Dhammaan xildhibaanadii hore;
    c) Ra'isalwasaaraha XFS & Xubnaha Golaha wasiiradda;
    d) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare;
    e) Gudoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah;
    f) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;
    g) Garyaqaanka Guud ee Dowladda;
    h) Diplomaasiyiinta Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee dibadda ka howlgala;
    i) Jeneraalada (Sareeyeyasha); Ciidamada Qalabka Sida.
    j) Madaxweyneyaasha iyo Ku-xigeenadooda ee Dowladda Goboleedyada;
    k) Guddoomiyeyaasha Baarlamaanada Dowlad Goboleedyada iyo Ku-xigeenadooda;
    l) Masuulkii kale ee uu garto Madaxweynaha JFS.
4) Dukumentiga safarka oo deg dega ah oo loo soo saaro muwaadin Soomaaliyeed oo aan haysan baasaboor, oo ku safraya kuna soo laabanaya dalka;
5) Dukumentiga Safarka Qaxootiga oo loo soo saaro qaxootiga magan-gelyada ka helay Soomaaliya, si waafaqsan Sharciyada dalka iyo Axdiga Qaxootiga ee Jineefa (Geneva Convention) ee 1951;
6) Warqadda guryo noqoshada (go home) oo loo soo saaro muwaadin aan markaas haysan baasaboor saxan laakiin xaq u leh ayna qasab tahay in uu u soo safro Soomaaliya, iyadoo ay ugu wacan tahay xaalad degdeg ah sida jirro halis ah, tarxiil, geeri ama dib-ugu-laabasho dal; iyo
7) Buugga bad-maaxa oo lagu soo saarayo dalabka Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda.

Qodobka 43aad:
Saxnaanshaha Baasaboorada iyo Dukumentiyada Safarka

1) Baasaboorka caadiga ah, midka diblomaasiga iyo kan adeegga ah waxaa loogu safri karaadhammaan dalalka caalamka oo dhan, marka laga reebo dalalka lagu xusay baasaboorka gudihiisa inaan lagu tegi karin.

2) Dukumentiga safarka ee deg dega ah wuxuu ansax ahaanayaa muddo cayiman oo ku caddukumentiga oo ah inta lagu gudanayo safarkaas degdega ah ee duruuftu keentay, lagunagaarayo dalka safarka loo yahay.
3) Dukumentiga safarka qaxootiga wuxuu ansax u yahay in loogu safro dhammaan dalalka kale, marka laga reebo dalka asal ahaan uu ka soo jeedo qofka sita, si loo dhawro badbaadadda & bed-qabka qofkaas qaxootiga ah.
4) Warqadda guryo-noqoshada waxaa isticmaalaya muwaadiniinta ay duruufuhu ku haystaan meel ka baxsan JFS marka la hubiyo muwaadinimadooda.

Qodobka 44aad:
Safarka Ilmaha Ka Yar (18) Sano

Iyadoo la ilaalinayo bed-qabka Caruurta isla markaana la dhawrayo shuruucda dalka iyokuwa caalamiga ah, ilmaha da'doodu ka yar tahay Sideed & Toban (18) sano, kama safri karaan dalka haddii uusan la socon mid ka mid ah waalidkood ama qof wata dammaanadsharci ah oo la xaqiijiyey in uu safrin karo ilmaha.

Qodobka 45aad:
Xadeynta Dadka Ku Safraya Baasaboorada Dawladda

1) Sarkaalka Socdaalku wuxuu u oggolaan karaa dadka uu u oggolaaday Sharciga Baasaboorka in ay ku safraan Baasaboorka Dawladda, marka laga reebo Baasboorka Shaqaalaha Dowladda (Service passport).
2) Sarkaalka Socdaalku isagoo gudanaya waajibaadkiisa wuxuu ka hubinayaa dadka ku safraya baasaboorada Dawladda in ay waafaqsan yihiin nidaamkii loogu talo- galay oo ah:
    a) In qofka ku safraya uu u socdo shaqo-dawladeed oo waafaqsan ujeeddadii lagu bixiyey baasaboorka; ama
    b) In safarkiisu yahay mid ay oggolaatay hay'addiisa, fasax qoraal ahna uu ka haysto.

Qodobka 46aad:
Dadka Tarxiilka (Dib-u-soo-celinta) Ku Imaanaya

1) Dadka Tarxiilka (Dib-u-soo-celinta) ku imaanaya waxaa loo oggol yahay in ay ka soo dagi karaan dalka oo dhan.
2) Shirkadaha diyaaradaha iyagoo kaashanaya safaaradda Soomaaliyeed ee ku taal waddanka dadka laga soo tarxiilayo ay joogaan, waxaa lagama-maarmaan ah in ay hubiyaan dadka ay soo qaadayaan in ay yihiin muwaadiniin Soomaali ah.
3) Shirkadaha diyaaradaha iyo noocyada gaadiidka kale inta aysan soo qaadin dadkaas waa in ay u soo gudbiyaan Hay'adda socdaalka warbixin dhammeystiran oo ku saabsan xogtaiyo cadadka dadka ay soo qaadayaan.
4) Shirkaddii u hoggaansami weysa tilmaamaha qodobadda Sharcigan, HSJS iyo Hay'adda Duulista Hawada Soomaaliyeed waxay si wadajir ah uga qaadayaan tallaabo waafaqsan Sharciga dalka u yaal.

Qodobka 47aad:
Ka-dhoofidda Dhulka JFS

1) Dhammaan dadka ka dhoofaya dhulka JFS waxay ka safri karaan baraha rasmiga ah ee laga dhoofo, haddii aysan jirin arrin degdeg ah ama sababo lama-filaan ah oo dhaaf siisan awoodda qofka.
2) Shirkaddaha diyaaradaha haddii ay ku xad-gudbaan nidaamka safarka iyo dadka rakaabka ah sida:
    a) Duullimaaadka oo daaha sabab la'aan;
    b) Qof aan ku jirin liiska (manifest) diyaaradda oo raaca ogaal la'aan;
    c) Qof liiska (manifest) ku jiray oo ka hara diyaarada cudur-daar la'aan; iyo
    d) Qof diyaar ah, sida waafaqsan nidaamka oo sabab la'aan la reebay.
3) Dhammaan arrimahaas waxaa ka dhalanaya ciqaab iskugu jirta mag-dhaw, ganaax lacageed ama shaqo-ka-joojin lagu sameeyo diyaaraddaas iyo hawl- wadeennadeeda, kadib marka la xaqiijiyo xil-gudasho-xumada (tort of negligence) ee dhinaca shirkadda diyaaradda ka timid.

Qodobka 48aad:
Shuruudaha & Dukumentiyada Loo Baahan yahay Marka La Dhoofayo

1) Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed wuxuu xaq u leeyahay in uu ka baxo dalka Soomaaliya marka laga reebo dadka ay mamnuuca ka tahay in ay dalka ka baxaan iyadoo ku saleysango'aan ama amar maxkamadeed.
2) Muwaadiniinta Soomaaliyeed way ka bixi karaan dalka Soomaaliya, haddii ay wataan baasaboor iyo dal-ku-gal sax ah oo ay ku gelayaan dalka ay u socdaan.
3) Baasaboor boggagiisu ay wada buuxaan laguma safri karo, lagumana soo geli karo bar- xudduudeedyada dhulka JFS.
4) Baasaboor waqtiga dhiciddiisa ay ka harsan tahay lix (6) bilood ama ka yar, laguma safrikaro, lagumana soo gali karo dalka JFS, marka laga reebo baasaboor loogu noqonayo dalkii laga soo saaray.
5) Shaqaalaha Dawladda waxay ku safri karaan Baasaboorka Shaqada (Service Passport), waxayna xaq u leeyihiin in ay haystaan inta ay shaqaale Dawladdeed yihiin.
6) Saraakiisha Sare, Diplomaasiyiinta iyo Siyaasiyiinta Dawladda ee Goleyaasha kala duwan waxay ku safri karaan Baasaboorka Diblomaasiga ah.

CUTUBKA 8aad:
ILAALINTA, WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA QAXOOTIGA
Qodobka 49aad:
Shuruudaha Qaxootinimada

Qof kasta oo bani'aadan ah wuxuu xaq u leeyahay in qaxootinimo loo aqoonsado sida uu qabo Heshiiska Geneva ee 1951 , si loo badbaadiyo noloshiisa iyo bed-qabkiisa, marka la hubsado arrimaha soo socda:

1) In ay jirto cabsi dhab ah oo waxyeello salka ku haysa sida, cadaadis midab, jinsiyad, diin, isir, fikrad siyaasadeed ama ka tirsanaan kooxo bulsho oo gaar ah, iyadoo qofkuuu dalkiisa ka cararay ama dibedda ka joogo, isla markaana cabsidaas darteed uusan dib ugu laaban karin si uu ugu nabad-galo dalkiisa; ama
2) In uu jiro weerar dibedda ah, duulaan, la-wareegid shisheeye ama dhacdooyin si xooggan u saameynaya nidaamka guud ee qeyb ama guud ahaan dalka uu qofku ka soo jeedo ama u dhashay oo dhan ama lagu qasbay in ay ka cararaan meeshii ay caadi ahaan u deganaayeen si ay magan-gelyo uga doontaan dal kale oo ka baxsan kii asalka u ahaa ama ay u dhasheen.

Qodobka 50aad:
Codsiga Magan-gelyo doonka

1) Qofka dalbanaya in loo aqoonsado Qaxootinimada waa in uu:
   a) Ku sugan yahay gudaha dhulka JFS; ama
   b) Si dhaqso ah u wargeliyaa Hay'adda arrintaasi u xilsaaran ama Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha, ama Xafiiska Socdaalka ee ugu dhow.
2) Hay'addu waxay sameynaysaa diiwaangelinta kowaad ee dadka qaxootiga ah iyo kuwa magan-galyo doonka ah, marka ay yimaadaan dhulka JFS, iyadoo siineysa oggolaansho deegaan ku-meel-gaar ah, sidoo kalena xogtooda la wadaageysa Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakayaasha iyo hay'adaha u xil-saaran amniga dalka.
3) Guddiga Qaranka ee go'aan-ka-gaarista Qaxootiga ayaa qiimeyn ku sameynaya codsiga qaxootinimada, go'aanna ka gaaraya.
4) Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha waxay qofka qaxootinimada dalbaday siinaysaa Aqoonsi sheegaya qaxootinimada codsadaha, marka ay hesho go'aanka Guddiga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga.

Qodobka 51aad:
Bixinta ama Diidmada Codsiga Qaxootinimada

1) Dawladda Soomaaliya waxay u madax-bannaan tahay in ay siiso ama u diido qofka dalbaday magan-gelyo ama qaxootinimo, si waafaqsan Sharciyada dalka iyo Axdiga Jineefa 1951.
2) Faqradda (1) ee qodobkan ma saameynayso dadka magan-gelyo doonka ah ee xoriyadooda iyo naftooda ay khatar ku gelayso dalkii ay ka soo jeedeen ama ka yimaadeen.
3) Hay'adda Qaxootiga Qaranku waxay ku oggolaanaysaa ama ku diidaysaa magan-galyo- doonka go'aanka uu gaaro Guddiga Qaran ee Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 52aad:
Xubnaha iyo Shaqada Gudigga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga

1) Guddiga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga wuxuu ka kooban yahay Sagaalka (9) xubnood ee soo socda:





20

a) Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha;
b) Wakiil ka socda Wasaaradda Amniga Gudaha;
c) Wakiil ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda JFS;
d) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
e) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
f) Wakiil ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda;
g) Wakiil ka socda Taliska Ciidanka Booliska Federaalka;
h) Wakiil ka socda Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha iyo
i) Wakiil ka socdo Wasaaradda Caddaaladda.

2) Guddigani wuxuu wada shaqeyn dhow la yeelanayaa Hay'adda Qaramadda Midoobay uqaabilsan Qaxootiga si ay u xaqiijiyaan gudashada waajibaadkooda.
3) Shaqada Guddiga Qiimeynta Qaxootinimada waa qiimeynta iyo go'aan-ka- gaarista codsiyada qaxootinimada sida ku cad sharcigan iyo "Sharciga Qaxootiga Soomaaliya".
4) Sida ku cad Faqradda (1) (b) ee Qodobkan, Guddiga waxaa guddoominaya Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha, waxayna shaqada Guddigu tahay:
   a) Oggolaanshaha iyo bixinta magan-gelyada Qaxootinimo; ama
   b) Diidmada magan-gelyada Qaxootinimada; iyo
   c) La socodka guud ahaan duruufaha dadka Qaxootiga ah.

CUTUBKA 9aad:
CIQAABTA SAARAN DADKA KU XAD-GUDBA SHARCIGA
Qodobka 53aad:
Gefafka Guud

1) Qofkii bulsho weynta ka mid ah oo geysta mid ka mid ah gefafka soo socda, waxaa arrintiisa loo gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh oo go'aan ka gaareysa, sida haddii uu:
   a) Si ula-kac ah ugu caawiyo qof kale in uu dalka u soo galo ama uga baxo si xad-gudubku ah sharcigan;
   b) Sameeyo gudbid ama isku-day gudbid bar soo-gelis-xudduudeed, iyadoo aan fasaxlaga haysan sarkaalka socdaalka;
   c) Qof kale si ula-kac ah u siiyo kaalmo ama u oggolaado qof kasta oo soo gelaya ama ka baxaya dhulka Soomaaliya, isagoo ku xad-gudbaya Qodobbada Sharcigan;
   d) Si ula-kac u diido in uu wargeliyo sarkaalka socdaalka kadib markii sidaas laga codsaday;
   e) Qofka sheegta in uu leeyahay baasaboor ama dukumenti safar ee qof kale;
   f) Oggolaado in baasaboorkiisa ama dukumentigiisa safarka loo isticmaalo ujeeddo sharci-darro ah;
   g) Ku sifoobo haysashada wax ka badan hal baasaboor ama dukumenti safar oo xogtiisa kala duwantahay;
   h) Ku guul-dareysto in uu ka jawaabo su'aal maan-gal ah oo uu weydiiyey sarkaal socdaalama bixinta macluumaad been ah;

i) Soomaaliya ku soo laabto iyadoo amarkii hore ee lagu masaafuriyey uu weli dhaqan-gal yahay; ama
j) Ku xad-gudbo ama ku guul-dareysto in uu u hoggaansamo shuruudaha uu Tilmaamayo Sharcigani.

2) Qofka siiya qof ajnabi ah shaqo, isagoo aan haysan oggolaanshaha uu Sharcigani tilmaamayo wuxuu muteysanayaa in laga qaado tallaabada sharci ee ku xusan Faqradda ee Qodobkan.

Qodobka 54aad:
Gefaf iyo Ganaaxyo Cayiman

1) Qof kasta oo been-abuura dukumenti dawladeed, sida baasaboorka, dal-ku-galka, qoraallada kale ee rasmiga ah ama Sarkaalka ogolaada isagoo aan fasax u qabin waxaa arrintiisa loogudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh oo go'aan ka gaareysa.
2) Qof kasta oo gacan ka geysta ama lagu helo in uu gacan ka geystay tahriibin dad, isagoo isticmaalaya wadiiqooyin sharci-darro ah, waxaa arrintiisa loo gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh oo go'aan ka gaareysa.
3) Qof walba oo ku lug yeesha safrinta dadka si jinsi ahaan looga ganacsado, ama ku lug yeesha ku-shaqeysi iyo xad-gudub carruur, waxaa arrintiisa loo gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh oo go'aan ka gaareysa.
4) Qofka ajnabiga ah ee dalka jooga maalmo ka badan muddadii ku xusnayd oggolaanshaha hore loo siiyey, waxaa maalintii ku soconeysa ganaax lacageed oo gaaraya Shillin Soomaali u dhigma Toban Doollarka Maraykanka ah (US$10) maalintiiba.

Qodobka 55aad:
Dhaqan-galinta Sharcigan

1) Fulinta Sharcigan iyo dhaqan-gelintiisa waxaa u xil-saaran dhammaan hay'adaha fulinta heer federaal iyo heer Dawlad-goboleed ee ku shaqada leh hawlaha uu xeerinayo Sharcigani.
2) Dhaqan-gelinta Sharcigan waxaa mas'uuliyad gaar ahi ka saaran tahay Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS) iyo dhammaan laamaha kale ee dawladda ee ay wada-shaqeynta la leedahay hay'addu.

Qodobka 56aad:
Xeer-nidaamiyeyaal iyo Hab-raaaacyo

1) Wasaaradda Amniga Gudaha waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyeyaal faahfaahinaya sida ugu habboon ee loo hirgelin karo Sharcigan, kadib marka ay soo diyaariso Hay'addu.
2) Agaasimaha Guud ee Hay'adda wuxuu soo saari karaa tilmaamo iyo hab-raacyo lagu meel-marinayo Qodobbada sharcigan iyo hannaanka shaqo ee HSJS.

Qodobka 57aad:
Baabi'in

Sharcigan wuxuu burinayaa oo meesha ka saarayaa sharci kasta oo ka hor-imaanaya amaaan la socon karin Sharcigan ee oo ku saabsan arrimaha socdaalka dhulka JFS oo uu ku jira Sharci Lr. 9 ee 27 Juun 1966 iyo hab-raacyadii ama siyaasadhihii ka farcamayey

Qodobka 58aad:
Dhaqan-gal

Sharcigani wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

SHARCI LR.007

Taarikh: 20 Maarso 2023

OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA LA-DAGAALANKA ARGAGIXISADA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0257/B11/23**, ku taariikheysan **19/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka La-dagaalanka Argagixisada.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga La-dagaalanka Argagixisada.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-033-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE SHARCIYEEDKA LA-DAGAALANKA ARGAGIXISADA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
09 MAR 2023
SOO GELID/RECEIVED

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

CUTUBKA KOOWAAD: QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad: Magaca iyo Ujeedada Sharciga

1. Sharcigan waxaa lagu magacaabaa: "Sharciga La-dagaallanka Argagixisada".
2. Ayada oo laga anbaqaadayo, waxyeellada iyo dhibaatada aadka u baaxadda weyn ee ka dhashay falalka ay argagixisadu ku beegsatay diinta, dhiigga, hantida, xasilloonida, dawladnimada iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed. Sidoo kalena, laga anbaqaadayo in hannaanka dawladnimada Soomaaliya ku salaysnaado sarreynta sharciga, ilaalinta xuquuqda iyo xorriyaadka asaasiga ah; ayaa waxaa lama huraan noqday in la soo saaro sharci ujeeddadiisu tahay:
    a. La-dagaallanka, ka hortagga iyo ciribtirka hawlaha argagaxisanimo
    b. Xakamaynta fal-dembiyeedka ka dhasha argagixisanimada; iyo
    c. In argagixisada caddaaladda la horkeeno, si waafaqsan sharciga.

Qodobka 2aad: Awoodda Sharcigan

1. Sharcigan waxaa lagu dabbaqayaa dhammaan hawlaha iyo faldembiyeedyada argagixisada ah
2. Arrimaha aan Sharcigan lagu xusin waxaa loogu noqonayaa Xeerarka Ciqaabta, Sharciga ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada iyo qawaaniinta kale ee khuseeya arrimahaan ee dalka.
3. Sharcigan wuxuu ka dhaqangalayaa dhammaan Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.
4. Qodobbada Sharcigan ayaa lagu dhaqayaa qof kasta oo gala falargagixisanimo, kana dhaca dalka Soomaaliya dibaddiisa; haddi la helo xaaladaha soo socda:
    a. Haddii fal-dembiyeedku ka dhaco gaadiidka berriga ama badda ama hawada dushiisa, gaadiidkaas oo ka diiwaangashan Dalka Soomaaliya ama calanka Soomaaliya wata;

b. Haddii falkaas uu dhibbane u noqdo qof Soomaali ah oo jooga meel ka baxsan waddanka Soomaaliya;
c. Haddii dembiiluhu yahay ajnabi jooga dalka gudihiisa;
d. Haddii ujeeddada fal-dembiyeedku yahay:
    i. in waxyeello loo geysto amniga, xasilloonida, hantida iyo danaha qaranka Soomaaliyeed ee gudaha ama dibadda;
    ii. In la dhibaateeyo ururrada iyo hay`adaha caalamiga ah; ama
    iii. In xukuumadda ama mid ka mid ah hay`adaheeda lagu qasbo in ay wax cayiman samayso ama ay ka reebtoonaato.

Qodobka 3aad: Eray Bixin

Haddii aan Sharcigan dhexdiisa si kale loogu fasirin, erayada soo socda, waxa ay yeelanayaan ama loola jeedaa macnaha iyo fasiraadda mid walba ku hor qoran:

1. Argagixisanimo: waxaa loola jeedaa fal dambiyeed uu geysto qof ama koox ama urur oo ku salaysan abuurid xasillooni darro, argagixin, qarxin, dil, buburin nidaam dowladnimo oo ay geystaan kooxaha ama shakhsiyaadka loo aqoonsanyahay argagixisada
2. Ujeedo argagixiso: waxaa noqonaya, wax kasta oo looga dan leeyahay in bulshada dhexdeeda looga abuuro xaalad argagax ah ama khatar lagu galiyo nolosha dadka, hantidooda, xorriyadahooda, xuquuqdooda, isla markaana lagu waxyeeleynayo bed-qabka bulshada iyo amnigooda ama lagu dhibaateynayo kaabayaasha asaasiga ah ee dawladda, nidaamka guud iyo danaha qaranka ama lagu cuuryaaminayo hay`adaha dawladda iyo adeegyada ay bixiyaan ama lagu waxyeeleynayo ama lagu hanjabayo hay`adaha caalamiga ah iyo kuwa diblomaasiga ah; iyadoo la adeegsanyo hub, qaraxyo, maaddo holacda, sun, feyrus iyo agab kasta ee kale oo isla ujeeddadaas lagu gaarayo
3. Urur ama Koox Argagixiso ah: waa koox ama maleeshiyaad, ka kooban saddex iyo wixii kasii badan, kana jirta dalka gudihiisa ama dibaddiisa oo loo abuuray ujeedo argagixisanimo ama ujeedkoodu yahay in ay ku kacdo argagixisanimo.

4. Argagixiye: qof kasta oo fala ama gala ama isku daya inuu galo ama qorsheeya (qaabkuu doonoba ha adeegsadee) fal-argagixisanimo ama qof kale ku dhiirrigaliya inuu fal caynkaas ah galo ama kaalin iyo qayb ku yeesha fal-argagixiso ah, dalka gudihiisa ama dibaddiisa ama abuura ama hoggaan u noqda ama xubin ka noqda koox ama urur argagixiso ah.
5. Fal Argagixisanimo: fal-dembiyeed kasta oo Sharcigan loogu aqoonsaday inuu yahay fal argagixiso, sida ku xusan qodobkiisa 4-aad ama sharciyada kale ee dalka sidaas loogu aqoon saday.
6. Dembi-argagixiso: fal-dembiyeed kasta oo ku cad Sharcigan uuna u aqoonsaday in uu dhaliyo fal-argagixiso ah ama sharciyada kale ee dalka sidaas loogu aqoonsaday.
7. Afkaar iyo Caqiido Argagixiso: waa aamminaad ku salaysan gaalaysiinta cid kasta oo aan ku aragti iyo fikir ahayn, banaysiga dhiigga, sharafta iyo hantida dadweynaha iyo shaqaalaha dowladda oo aan ku afkaarta ahayn, ku meel marinta aragtidaas gurracan si sandulle ah, iyadoo la adeegsanayo qaab iyo waddo kasta oo muquumin ah, sida: dil, qarax, dhac, boob, hanjabaad, argagax galin iyo wax kasta oo la mid ah oo ujeeddadaas laga leeyahay.
8. Hub: waxaa loola jeedaa:
    a. Hub caadi ah; oo ah agab leh awood uu wax ku dilo, ku dhaawaco, ku cuuryaamiyo ama ku burburiyo, ha noqdo hubka xabaddu ka dhacado, sida: qantaal, madfac, qori, bastoolad iyo hub kasta oo ku shaqeeya baaruudda qaraxda ama holacda, ama ha noqdo hubka cad oo aan xabaddu ka dhicine, sida: baangad, middi (toorreey) iyo wixii la mid ah;
    b. Hub aan caadi ahayn; oo ah walax ama agab leh awood uu wax ku dilo, ku dhaawaco, ku curyaamiyo ama ku burburiyo, sida: hubka sida ba'an wax u gumaada iyo hub kasta oo ka samaysan walxaha qarxa, maaddo kiimikaal ah, sun ah ama feyrus xanbaarsan ama bayoologi ah ama nukliyeer ah
9. Maalgalin Argagixiso: u uruurin hanti guurto ah ama ma guurto ah ama u fidin taageero dhaqaale oo muuqta ama qarsoon ama gacansiin maaliyeed si toos ah ama si dadban ama u xawilid lacag ama ku taakulayn hub, agab, maado qaraxda, holacda ama walax kale, oo dhammaantood ama qaarkood loo adeegsaday ama loo

adeegsanayo ama ay muuqato in loo adeegsan doono argagixisanimo ama siin xog ama adeeg; urur ama koox argagixiso ah iyo wadiiqad kasta oo kale oo taakulo ah ama maalgalin ah, (falka argagixisada ahi ha dhaco ama yaanu dhicine). Faqradaan waxaa lala aqrinayaa qodobka 3-aad ee Sharciga ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgalinta Argagixisada

10. Xayiraad Hanti: saarid xayiraad ku meel gaar ah; hanti nuuca ay doonto ha noqotee, muddo cayiman oo ah inta ay xaqiijintu ama maxkamadeyntu sacoto, si aan loogu isticmaalin ama loo wareejin ama loo dhalan rogin, si waafaqsan go'aanka maxkamadda awooda u leh.
11. La-wareegid Hanti: hanti nuuca ay doontaba ha noqotee, in qof ama koox argagixiso ah lahaanshiyaheeda laga wareejiyo dhammaanteed ama qaarkeed, laguna wareejiyo dawladda, si waafaqsan go'aan maxkamadeed.
12. Lacag Dhaqid: waxaa loola jeedaa fal-dembiyeedyada ku xusan qodobka 2-aad, qaybta 2-aad ee Sharciga ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgalinta Argagixisada.
13. Hanti: waxaa loola jeedaa:
    a. Hanti kasta oo ma guurto ah, sida: dhul, guryo, dhisme, aseendo (Dhul beereed) iwm; iyo
    b. Hanti kasta oo guurto ah, sida: gaadiid, xoolo, lacag caddaan ah, jeegag, amarro lacag bixin, saamiyo, curaar, warqadaha deynta, dokumiinti kasta oo lahaanshiyo muujinaya iyo lacagaha maalgashiga ku jira ama faa`iidada laga helo.
14. Hanti Argagixiso: waxaa loola jeedaa:
    a. Hanti kasta, guurto ah ama ma guurto ah oo laga helay fal argagixiso ah ama sababtiis ama ku hanjabidiisa lagu helay;
    b. Hanti kasta, oo loo adeegsadey ama la adeegsanayo ama la damcasanyahay timaaddada in loo adeegsado fulinta fal argagixiso;
    c. Hanti kasta, oo uu leeyahay, uu maamulo ama loo hayo urur ama qof argagixiso ah; iyo
    d. Hanti kasta, oo loo ururiyey in lagu taageero ama lagu taakuleeyo urur ama qof argagixiso ah ama lagu maalgaliyo fal-argagixiso ah.

15. Hay`ad Maaliyadeed: waa shakhsi dabiici ah ama shakhsi qaanuuni ah, oo sameeya dhaqdhaqaaqyada ganacsi ee ay ka midka yihiin:
    a. Qabashada, keydinta iyo maamulidda hanti dadweyne;
    b. Soo saarista iyo maaraynta nidaamka lacag bixinta sida: jeegagga, kaararka amaahda, amarrada lacag bixinta, xawilaadda elektarooniga ah iwm;
    c. Bixinta damaannad iyo balanqaad maaliyadeed;
    d. Ku ganacsiga suuqa iyo warqadaha lacagta
    e. Hannaanka amaahinta iyo qaansheegadka;
    f. Maalgalinta iyo maareynta hanti ama lacag ay dad kale leeyhiin;
    g. Sarrifka lacagta wadanka iyo lacagaha qalaad iyo kala wareejinta badeecooyinka;
    h. Adeegyada xawilaadda
    i. Qabashada iyo bixinta caymisyada iyo maalgashiga kale ee la xiriira.
16. Hor-qabateynta Adeegyada Isgaarsiinta: waxaa loola jeedaa qabshada, dhexgalka iyo hubinta dhammaan xiriirada isgaarsiineed ee la tuhunsan yahay in loo adeegsadey ama loo adeegsan karo fal argagixiso ah, sida: dhageysiga hadallada taleefannada, daalacashada qoraalada iyo dhanbaallada la isku weydaarsado mobaylada iyo baraha bulshada iyo baarista agabka lagu diro Boostada; si waafaqsan ogolaanshiyaha maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 4aad: Fal Argagixiso

Fal Argagixiso, haddii uusan Sharcigani si kale u sheegin, waxaa loo aqoonsanayaa fal kasta oo ka mid ah waxyaabaha soo socda, markii loo sameeyo ujeeddo argagixisanimo owgeed;

1. Dilid qof;
2. Curyaamin qof ama u geysasho dhaawac jireed oo halis ah;
3. Si ogaal ah ama u kicin rabshad ama abuurid arbushaad; ayadoo looga dan leeyahay in argagax bulshada lagu galiyo naftooda, xorriyadooda ama amnigooda lagu khatar galinayo ama hantidooda lagu burburinayo
4. Hogaaminta ama madax u noqoshada iyo isku duwidda koox argagixiso ah oo hubeysan ama aan hubaysnayn iyo sidoo kale, kaalin ku yeelashada hawlahaas;

5. Ku qaadidda weerar hubaysan iyo waxyeelaynta ciidammada qalabka sida iyo kuwa amniga iyo xarumahooda ama fadhiyadooda; ujeeddo argagixisanimo owgeed.
6. Waxyeelaynta ama ku qaadid weerar hubaysan; ergooyinka diblomaasiga ah iyo gaadiidka ama xarumaha ururrada iyo hay'adaha caalamiga ah ee waddanka ka shaqeeya; ujeeddo argagixisanimo darted
7. Adeegsiga hub ama agab ama walax qarxa, holca, maado kiimikaal oo sumaysan, bayoolaji ama nukliyeer ah, aasid miino, tuurid gantaal iyo wax kasta oo la jaad ah, oo leh awood ay wax ku dilaan ama ay ku gaystaan dhaawac jireed oo daran ama wax ku burburiyaan ama bulshada lagu argagax galinayo;
8. Waxyeelaynta xarumaha danta guud ama hay'adaha dawladda ama kaabayaasha guud iyo carqaladaynta dhammaan adeegyada dawladda ee asaasiga ah, sida: waxbarashada, caafimaadka, biyaha, difaaca madaniga ah, isgaarsiinta, nidaamka kombuyuutarka, waddooyinka caamka ah, internetka, bangiyada, garoommada, dekadaha iwm, iyadoo ujeeddadu tahay qalqal galinta amniga, xasilloonida guud iyo hannaanka nolosha;
9. Hubaynta, maalgalinta iyo kicinta dad; si looga shaqeeyo ama loo abuurofitno, xasarad iyo dagaal sokeeye;
10. Ku kicid afduub, xirasho ama xorriyad ka qaadid qof iyo ka badan amaqaadasho baad lacageed; falalkaas oo ay ka dhalato in amniga dalka iyo wadajirka bulshada la qalqal galiyo ama argagixisannimadana la dhiiragaliyo;
11. Ku xadgudbid qof ku sugan garoon gudihiis ama diyaarad ama markabdushiis saaran, oo ay ka dhalato ama ay ka dhalan kartey in uu halis galobedqabka rakaabka ama ay khatar gasho badbaadada garoonka ama diyaaradda ama markabka ama burbur hantiyadeed.
12. Waxyeelaynta ama ka dhigid hawlgab diyaarad ama markab rayid ah;
13. Sumaynta ama gaarsiinta dhib weyn cimilada ama nabadgalyada cuntada, arrinkaas oo sababi kara qalqal iyo halis caafimaad;
14. Xoog kula wareegid ama afduubasho diyaarad, markab, doon, gaari iyowax kasta oo ka mid ah gaadiidka dhulka, badda iyo cirka, si loo xaqiijiyo ujeeddo argagixiso.

CUTUBKA 2AAD: FAL DEMBIYEEDYADA ARGAGIXISANIMO IYOCIQAABTOODA

Qodobka 5aad: Gelidda Fal Argagixiso

1. Qof kasta oo gala fal Argagixiso ayna ka dhalato falkaas dhimasho;waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah;
2. Qofkii gala fal Argagixiso ayna ka dhalato dhaawac daran ama cuuryaamin ama burbur hantiyeed oo baahsan; waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa`in ama xabsi adag oo aan ka yarayn shan iyotoban (15) sano;
3. Qofkiise, isku daya inuu galo ama qorsheeya fal-argagixisanimo (qaabkuudoonoba ha adeegsadee), waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn 10(toban) sano, ayadoo la eegayo hadba heerka waxyeello ee ka dhalan kartey falkaas haddii uu dhici lahaa.

Qodobka 6aad: Asaasidda iyo Xubin ka Noqoshada Koox ama Urur Argagixiso ah

1. Qofkii abuura ama asaasa ama maamula ama hoggaamiya urur ama koox argagixiso ah, si loo sameeyo mid ama qaar ka mid ah dembiyadaargagixiso ee Sharcigan ku cad; waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ahama xabsi daa'in.
2. Qofkii xubin ka noqda urur ama koox argagixiso ah oo dalka ka jirta amamid caalami ah oo Dowladda Soomaaliya u aqoonsantahay argagixiso, iskaashi la yeesha; waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayntoban (10) sano kana badnayn labaatan (20) sano.
3. Qofkii, xubin ka noqda urur ama koox argagixiso ah, islamarkaana tababbar ciidan ama amni ama farsamo gaar ah ka qaata koox argagixiso ah si ujeeddo argagixisanimo loo xaqiijiyo; waxaa laguciqaabayaa xabsi adag oo aysan muddadiisu ka yarayn (15) shan iyo toban sano.
4. Qofkiise, qof kale ku qasba ama ku hoggaamiya inuu xubin ka noqdo amahor-istaaga inuu ka soo baxo urur ama koox argagixiso ah; waxaa laguciqaabayaa xabsi daa`in, haddiise qasabkaas ama diidmadaas ay ka dhalato dhimasho, ciqaabtu waxayse noqonaysaa dil toogasho ah.

Qodobka 7aad: Samaynta ama Haysashada Hub ama Agab Lagu Fulinayo Fal Argagixiso

Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka badnayn labaatan (20) sano; qofkasta oo asagoo og- haysta hub caadi ah ama sameeya ama xada ama fududeeya in la haysto ama qof kale siiya; ayadoo ujeeddadu tahay fulinta amadiyaarinta ama billaabista fal argagixiso. Haddiise, adeegsiga hubkaas ay ka dhalato dhimasho, ciqaabtu waxay noqonaysa dil toogasho ah.

Qodobka 8aad: Isticmaalka Hub ama Qaraxyo Nukliyeer, Kiimikaal ama Bayoologi ah

Qofkii adeegsada, sameeya, haysta ama helistiisa fududeeya hub aan caadi ahayn ee leh awood uu wax ku dilo ama ku gaysto dhaawac daran ama burburbaahsan sida: walxaha qarxa ama holca, maaddo kiimikaal ah ama bayoologiah ama nukliyeer ah waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in. Haddiise, isticmaalka ama haysashada hubkaas aan caadiga ahayn ay ka dhalato dimasho, ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho ah.

Qodobka 9aad: Fal argigixiso oo ah Qafaalasho iyo Xoog ku Haysasho Qof ama Dad

Qof kasta oo fal argagixiso afduub ku gaysta, xoog ku haysta ama xoorriyada ka qaada qof ama dad, si uu madax furasho ama dheef kaleba u helo ama hay'adaha dowladda ugu qasbo in ay wax mucayan ah sameeyaan ama ay ka reebtoonaadaan; waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban (10) illaa labaatan (20) sano. Haddii falkaas ay ka dhalato dhaawac jireed ama cuuryaamin, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in. Haddiise, ay dhimashoka dhalato, ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho ah.

Qodobka 10aad: Bixinta ama Qaadashada Tababbar Argagixiso

Qofkii, qof ama koox ku tababbara -si toos ah ama si dadban- adeegsiga hubcaadi ah ama aan caadi ahayn ama farsamooyin, xirfado, xeelado iyo wadiiqooyin dagaal ama isticmaalka shabakad isgaarsiineed oo silig leh ama silig la'aan ah (wireless) ama elektoroonik ah, si dhammaan waxyaabahaas loogu fuliyo hawl argagixiso, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban(10) ilaa labaatan(20) sano.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 11aad: Gabbaadsiinta Qof iyo Qarinta Wax Lagu Fuliyay Fal Argagixiso

Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn toban(10) sano, qofkii:

1. Qof kasta oo si ula kac ah u qariya wax loo adeegsaday ama loo diyaariyay in loo adeegsado fal Argagixiso ama qariya hanti ama raad ka dhashay falkaas;
2. Si kas ah, u baabi'iya ama xada ama qariya dokomiinti qoraal ah ama electoroonik ah oo fududayn karay in fal argagixiso ah la kashifo ama caddayn noqon lahaa;
3. Asagoo og siiya qof argagixiso ah magangalyo, gabbaad, howl-fududayn ama inuu fakado u fududeeya qof galay fal argagixiso, ka hor ama kadibqabashaddiisa.

Qodobka 12aad: Xayaysiinta Afkaarta Urur ama Koox Argigixiso ah

Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya saddex(3) ilaa shan(5) sano:

1. Qofkii xayaysiiya ama faafiya afkaar argagixisanimo ama haysta agabkawax daabaca ama wax duuba oo loo isticmaalay ama loo darbay in loo isticmaalo arrimahaas ama koox argagixiso ah u sameeya suurad wanaajinama dacaayad ama danaheeda difaaca, si toos ah ama si dadban, si oraah ah ama qoraal ah ama wadiiqo kaleba iyada oo ujeeddadu tahay in uu caawiyo argagixisada;
2. Qofkii abuura ama maamula mareeg ama shabakad warbaahineed amaisgaarsiineed, si loogu faafiyo ama loogu baahiyo afkaar iyo dacaayad lagu taageerayo ama lagu sumacad wanaajinayo koox argagixiso ah ama lagu marin habaabinayo hay'adaha amniga ama lagu saamaynayo hab-sami socodka caddaaladda arrin ku saabasan dembi argagixiso;
3. Qofkiise, si aan sharci ahayn u gala mareeg ay hay`ad dowladeed leedahay, si uu u tiro ama u dhalan rogo ama u qaato xog ku jirta mareegta, ujeeddo argagixisanimo owgeed; dembiga farqadda 2aad ee kor ku xusan waa loo sii kordhinayaa.

Qodobka 13aad: Faafinta Been-abuur ku Saabsan Fal Argagixiso

1. Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn hal (l) sano kana badnayn saddex (3) sano ama waxaa lagu ganaaxayaa lacag dhan toban (10) kun illaa shan iyo toban(15) kun

oo Doollarka Maraykanka ama lacagta dalka ee u dhiganta ama labadaas ciqaabood oo wada jira;

2. qofkii asagoo og, faafiya (wadiiqaduu doonaba ha adeegsadee) ama baahiya ama soo bandhiga xog aan xaqiiqada ku salaysnayn oo ah been abuur ku saabsan hawlo argagixiso oo waddanka ka dhacay ama hawlgallada ka hortaggooda la xiriira.
3. Haddiise, qofka falkaas kukacay uu hoos tago amarkana ka qaato cid kale, qofka falka gaystay iyo qofkamasuulka ka ah labadaba waxa ay mutaysanayaan ciqaabta kor ku xusan.

Qodobka 14aad: Waajibnimada soo Gudbinta Xogaha ku Saabsan Falalka Argigixisada

Qof kasta oo ka war hela jiritaanka fal argagixisannimo, ogaada diyaargarowga iyo diyaarinta fal caynkaas ah ama ay soo gaarto xog laxiriirta cidda falkaas ku hawlan oo aan soo war galin hay'adaha ku shaqada leh, islamarkaana ay suuragal u ahayd inuu soo gaarsiiyo. Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn lix(6) bilood kana badnayn saddex(3) sano iyo ganaax lacageed oo aan ka badnayn toddoba(7) kun oo Doollarka Maraykanka ama lacagta dalka ee u dhiganta ama mid ka mid ah labadaas ciqaabood;

a) Qof kasta oo ka war hela jiritaanka fal argagixisannimo, ogaada diyaargarowga iyo diyaarinta fal caynkaas ah ama ay soo gaarto xog laxiriirta cidda falkaas ku hawlan oo aan soo war galin hay'adaha ku shaqada leh, islamarkaana ay suuragal u ahayd inuu soo gaarsiiyo.

b) Ciqaabta faqrada (b) ee sare ku xusan, waxaa laga dhaafayaa, haddii dembiiluhu yahay mid ka mid ah dadka soo socda: xaaska, waalidka dhalay ama caruurta qofka xogta helay.

Qodobka 15aad: Shirqool iyo abaabul Dambi.

1. Qof kasta oo gala ama qayb ka noqda heshiis ama is-afgarad ujeeddadiisu tahay in la sameeyo mid kamid ah dembiyada argagixiso ee ku cad Sharcigan; waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayntoddoba (7) sano. Hase yeeshee, qofka leh

hindisaha iyo dhiirigalinta heshiiskaas ama asagu leh socod siintiisa; ciqaabtiisu waxay noqonaysaa xabsi daa`in ama xabsi adag oo aan ka yarayn toban (10) sano;

2. Qof kasta oo ku xadgudba qof ka mid ah dadka u xilsaaran dabbaqiddaama fulinta qodobbada Sharcigan ama xoog ama hanjabaad u adeegsada, inta ay waajibkooda shaqo ku dhex jiraan; waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn todobo (7) sano. Hase yeeshee,haddii falkaas uu ka dhasho dhaawac halis ah ama cuuryaamin ama dembiiluhu adeegsado hub ama afduub, ciqaabtiisu waxay noqonaysaaxabsi daa'in ama xabsi adag oo aan toban (10) sano ka yarayn. Haddiise, falkaas ay ka dhalato dhimasho; ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho ah;
3. Qof kasta oo shirqool ama xadgudub ku maleega gudaha dalka Soomaaliya, asagoo kaashanaya qof kale, si looga fuliyo fal meel ka baxsan dalka, kaas oo markii Sharcigan loo eego noqonaya fal argagixiso; waxaa loo aqoonsanayaa sidii fal lagu fulinayo dalka gudihiisa, ciqaabtiisuna waa xabsi dhan Shan (5) illaa toban (10) sano.
4. Qof kasta oo qof kale shirqool kala fuliya meel ka baxsan dalkaSoomaaliya, si fal argagixiso looga fuliyo gudaha dalka; waxaa lagu ciqaabayaa isla ciqaabta ku xusan faqradda 3-aad ee qodobkaan;
5. Qof kasta oo qayb ka ah shirqoollada ama heshiisyada Sharcigan ka dhanka ah, haddii uu iskiis hay'adaha ku shaqada leh soo wargaliyo jiritaanka fal-dembiyeedkaas k a hor inta aanu d h i c i n; c i q a a b a h a qodobkaan ku xusan waa laga cafinayaa. Sidoo kale, waa laga cafin karaa ciqaabta, kadib markii uu falku dhaco, haddii uu fududeeyo ama uu suuragaliyo in dembiilayaasha kale gacanta lagu soo dhigo.

Qodobka 16aad: Ku Xadgudbid Shakhsi Diblomaasi ah ama Xoog ku Galid Xarun Diblomaasi

Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oon ka yarayn shan iyo toban(15) sanokana badnayn labaatan iyo shan(25) sano qof kasta oo:

1. Afduub, xorriyad ka qaadid ama xadgudub gacan qaad gaarsiisan kula kaca shakhsi diblomaasi ah ama haysta xassaanad dawli ah ujeeddo argagixiso owgeed;
2. Xoog ku gala ama isku daya inuu xoog ku galo ama waxyeelo u gaystaxarumaha ama dhismayaasha hay'adaha diblomaasiga iyo Ururada caalamiga ah, si fal argagixiso loo fuliyo;

3. Haddii xadgudubka ku xusan faqradaha (b iyo t) ee qodobkaan loo adeegsado hub ama qarax ama ay dhawr qof isla sameeyaan ama la adeegsado aqoonsi iyo labis dawladeed ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daa`in;
4. Haddiise, falkaas ay ka dhalato dhimasho, ciqaabtu waxay noqonaysaadil toogasho ah.

Qodobka 17aad: Ku Xadgudbid Xarumaha Dawladda

1. Qof kasta oo xoog ku gala, la wareega, weerara ama argagax galin iyo hanjabaad ku sameeya xarumaha dowladda, ujeeddo argagixisanimo owgeed, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn labaatan(20) sano;

2. Haddii falkaas loo adeegsaday hub ama dhawr qof ka qayb qaateen ama burbur xoogan ka dhashay ama dembiiluhu ciidanka amniga uu xoog isaga caabiyey; ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daa`in;
3. Haddiise, falkaas ay dhimasho ka dhalato ciqaabtu waxa ay noqonaysaa dil toogasho ah.

Qodobka 18aad: Qayb ka Noqoshada Falal Argagixiso

Qof kasta oo si ogaal ah qayb uga noqda ama kaalin ku yeesha fal argagixiso, waxaa lagu ciqaabayaa isla ciqaabta u dagsan falaha asalka ah ee dembigaas.

Qodobka 19aad: Kicinta iyo Dhiirra-galinta Fal Argagixiso

Qof kasta oo kiciya qof kale ama ku dhiirra-galiya in uu qayb ka noqdo fal amaheshiis argagixiso, falkaasina uusan gaarin inuu dhaco, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn Shan(5) sano kana badnayn toban(10)sano

Qodobka 20aad: Adeegsiga iyo Samaynta Labbis ama Aqoonsi Ciidan ama Dowladeed

Qof kasta oo ujeeddo argagixisannimo owgeed, u soo dhoofsada, sameeya, haysta, iibsada ama xirta labbis u gooni ah ciidammada qalabka sida ama hay'adahaamniga ama adeegsada aqoonsi, calaamad ama astaan ciidan iyo qof kasta oo sameeya, been abuura aqoonsi dawladeed ama sheegta magac iyo mansab aanu lahayn, isla ujeedada sare ku xusan waxaa lagu ciqaabayaa lix(6) illaa laba iyo toban(12) sano oo xabsi ah iyo lacag dhan $30,000 (Soddon kun oo doollar).

Qodobka 21aad: Gacansiinta iyo Hagidda Fulinta Fal Argagixiso

1. Qof kasta oo ku gacansiiya, caawiya, haga, u fududeeya ama khibrad siiya qofama koox fulinta fal argagixiso ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban(10) illaa labaatan(20) sano.

2. Haddii falkaas uu ka dhasho dhaawac culus ama burbur xooggan, ciqaabta caawiyaha ama hagaha, waxay noqonaysaa xabsi daa`in, haddiise, dhimasho ka dhalato, ciqaabtu waadil toogasho ah.

Qodobka 22aad: Afduubka Gaadiidka Cirka, Badda iyo Dhulka

1. Qof kasta oo xoog kula wareega ama afduubta mid ka mid ah gaadiidkadhulka, badda iyo cirka, asagoo xaqiijinaya ujeedo Argagixiso waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya 10(toban) ilaa 20(labaatan)sono.
2. Haddii, gaadiidka la afduubtay ay leeyihiin Ciidamada qalabka sida ama falkaas uu ka dhasho dhaawac ama burbur hantiyeed, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daa'in. Haddiise, falkaas ay dhimasho ka dhalato, ciqaabtu waa dil toogasho ah.

Qodobka 23aad: Maalgalinta Koox ama Qof ama Fal Argagixiso ah

1. Qof kasta oo koox ama urur argagixiso ahmaalgaliya, si toos ah ama si dadban, ama siiya hub ama walax kale oomarkii fal argagixiso loo adeegsado khatar galinaya nafta iyo hantida dadka ama dowladda waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa`in ama xabsi adag

oo aan ka yaraynshan iyo labaattan (25) sano;

2. Qof kasta oo maalgalinaya qof ama fal argagixiso ah; waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa`in ama xabsi adag oo aan ka yarayn shan iyo toban (15) sano;
3. Qof kasta oo qof argagixiso ah ku gacan siiya in uu u safro dawlad kale, si halkaas uu uga fuliyo, wax uga qorsheeyo, u diyaariyo ama uga qayb qaato fal argagixso ah; waxaa lagu ciqaabayaa isla ciqaabta ku xusan faqradda (2) ee qodobkan;
4. Haddii, cidda maalgalinta bixisay ay tahay shirkad ama shakhsi qaanuuni ah waxaa loo ciqaabayaa qofka musuulka ka ah iyo qof kasta oo ka qaybqaata falkaas.

Qodobka 24aad: Is-hortaag Caddaaladeed

Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka badnayn(10) sano iyo ganaax lacageed oo u dhaxeeya labaatan(20) kun ilaa soddon(30) kun oo Doollarka Maraykanka ah marka ay ku cadaato ama lacagta dalka ee u dhiganta ama labadaas ciqaaboodoo isla socda;

1. Qofkii, si ula-kac ah u sameeya is-hortaag ama tallaabo ama fal keenikara in uu saamayn taban ku yeesho ama uu carqaladeeyo habsami usocodka caddaalada; iyo
2. Qof kasta oo sarkaal dowladeed ah oo ku lug leh dacwad socota oo Sharcigani ku dabaqmayo, oo si ula-kac ah u sameeya wax ka mid aharrimaha soo socda:
    a. Adeegsada ama isku daya inuu adeegsado xoog ama hanjabaad;
    b. Joojiya ama isku daya in uu joojiyo bixinta caddayn;
3. Qof ku qasba inuu keeno caddayn been ah ama ka reeba inuu caddayn bixiyo;
4. Faragalin ku sameeya caddaymaha si uu carqaladeeyo hab-raaca dacwadda;
5. Siiya wax-dheef qof ama ballan qaad u sameeya, si uu ucarqaladeeyo habsami u socdka caddaalada; ama
6. Qariya ama gabbaad siiya qof lagu tuhunsan yahayargagixisanimo.

Qodobka 25aad: Xog Uruurin iyo Basaasnimo

1. Qof kasta oo uruuriya, keydiya ama gudbiya xog si loogu adeegsado diyaarinta ama

sameynta fal argagixiso markey ku cadaato, waxaa lagu ciqaabayaa toban (10)sano oo xabsi ah.

2. Qofkii xiriir basaasnimo la yeesha dawlad, hay`ad, urur ama koox ajnabi ah ama iskaashi la sameeya ciidan dowlad anjabi ah, Si loo maleego ama loo fuliyo fal argagixiso oo ka dhan ah Dowladda Soomaaliya ama danaheeda gudaha iyo dibadda, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya todobo (7) illaa toban iyo labo (12) sano.
3. Haddiise, falka argagixisanimo ee ku xusan faqraddaan uu dhaco, iyadoon dhimasho kadhalan, ciqaabtiisu waa xabsi daa`in.

Qodobka 26aad: Xad-gudubyada ka Dhanka ah Badbaadada Duulimaadyada Rayidka ah

Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya shan iyo toban (15) illaa labaatan iyo shan(25) sano qof kasta oo ku kaca mid ka mid ah falalka hoos ku xusan:

1. In xadgudub gacan qaad gaarsiisan lagula kaco qof saaran diyaarad rayid ah oo duulimaad ku jirta, haddi falkaasi keeni karay halis galinta badbaadada diyaaradaas ujeeddaduna tahay fal argagixiso;
2. In la burburiyo diyaarad rayid ah oo shaqaysa, la waxyeelleeyo ama laga dhigo hawlgab ama la halis galiyo badbaadadeeda;
3. In lala koro ama la fududeeyo, la dhex dhigo diyaarad shaqaynaysa agab, walax ama maaddo burburin karta ama u gaysan karta waxyeelayn halisgalin kara duulimaadka diyaaradaas;
4. In la waxyeelleeyo ama hawlgab laga dhigo qalabka hagistadiyaaradaha rayidka ah, haddii ay suuragal tahay in falka caynkaas ahiuu halis galin karo badbaadada diyaarad rayid ah oo duulimaad ku jirta;
5. In si ogaal ah, loo faafiyo ama loo sheego war been ah oo lagu halis galiyobadbaadada iyaarad duulimaad ku jirta;
6. Haddi dhammaan falalka faqrooyinka sare ku xusan uu ka dhasho dhaawac ama burbur, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daa`in. Haddiise, dhimasho ka dhalato ciqaabtu waa dil toogasho ah.

Qodobka 27aad: Xad-gudubyada ka Dhanka ah BadbaadadaGagooyinka Diyaaradaha

Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban iyo toddobo(17) illaasoddon(30) sano qof kasta oo si ula kac ah u halis galiya badbaadada garoondiyaaradeed oo rayid ah, asagoo adeegsanaya qalab, hub ama maaddo, kunakaca mid ka mid ah arrimaha soo socda:

1. Burburinta iyo waxyeelaynta agab uu leeyahay garoon diyaaradeed oo u adeegaya duulimaadyo caalami ah ama qalqal galinta badbaadada garoon bixiya adeeg duulimaad oo rayid ah oo la xiriira fal argagixiso.
2. Burburinta iyo waxyeelaynta agab uu leeyahay garoon diyaaradeed oo u adeegaya duulimaadyo caalami ah ama qalqal galinta badbaadada garoon bixiya adeeg duulimaad oo rayid ah oo la xiriira fal argagixiso.
3. Xadgudub iyo qalalaase kula kaca qof ku sugan garoon diyaaradeed oo u adeegaya duulimaadyo rayid ah, kaas oo keeni kara dhaawac ama dhimasho oo la xiriira fal argagixiso.

Qodobka 28aad: Guda-galka Fal Argagixiso

Guda-galka fal argagixiso ah waxay lamid tahay galidda fal argagixiso ah oo dhammaystiran, ciqaabtiisuna waxay noqonaysaa ciqaabta u deggan isla falkala guda-galay oo dhamaystiran.

Qodobka 29aad: Qaadidda Tallaabooyin Maamul

Markasta oo uu dhaco xukun eedayn fal argagixiso ah, maxkamadda awooddau leh waxaa u furan in ay qaaddo tallaabooyinka soo socda:

a. Dadka ajaanibta ah ee lagu helo dembi argagixiso in waddanka laga musaafuriyo, kadib markii ay ciqaabtooda dhamaystaan ama ay wadankooda ku dhamaystaan haddii iskaashi nuucaas ah jiro;

b. In dadka argagixisada iska soo dhiibay ee la cafiyey ama kuwa ciqaabtoodii dhamaystay lagu waajibiyo in ay degaan meel cayiman ama ay joogaan waqtiyo

xaddidan meelo loo cayimay ama laga reeboin ay degaan ama tagaan meelo cayiman;

c. In laga reebo in ay adeegsadaan wadiiqo isgaarsiineed oo cayiman;
d. In lagu waajibiyo in uu ka qayb qaato dawraad dhaqan celin ah;
e. Marka laga reebo tallaabada faqradda (a) ku xusan; muddada tallaabada maamul kama badnaan karto shan(5) sano.
f. Qofkii khilaafa amarrada sare ku xusan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka badnayn hal(1) sano.

Qodobka 30aad: Ciqaab Cafin

1. Waxaa laga cafinayaa dhammaan ciqaabaha u dagsan dembiyada ku xusan Sharcigan ama waa laga khafiifinayaa; qof kasta oo horey uga tirsanaa koox ama urur argagixso ah ama ku howlanaa fal argagixiso, haddii uu ku dhaqaaqo tallaabooyinka soo socda:
   a. In uu soo war-galiyo hay`adaha dowladda ee ku shaqada leh, in uu iskiis uga soo baxay, gabi ahaanba koox ama urur argagixiso ah, islamarkaana uu ka soo laabtay afkaarta iyo caqiidada argagixisada;
   b. in uu joojiyey wax kasta oo fal dembiyeed ah.
   c. In uu isu soo dhiibo, uuna horyimaado hay`adaha amniga, una degdego in uu laamaha amniga ee ku shaqada leh kala shaqeeyo fashilinta iyo ka hortagga fal ama heshiis argagixiso ka hor inta aan la fulin falkaas.
2. Maxkamadda awoodda u leh waxaa u furan in ay cafiskaas uga faa`iidayso dembigu markii uu dhacay ka bacdi; dembiilihii hay`adaha ku shaqada leh u suuragaliya ama u fududeeya soo qabashadadembiilayaal kale oo qayb ka ahaa faldembiyeed dhacay ama ku hawlan fulinta falal kale oo argagixiso.
3. Dadka cafiska loo fidiyo ee ka soo baxaya Urur ama koox argagixiso ahama ka soo laabta fikir Argagixiso; ka hor inta aan loo dhiibin xil Dowladeed; waa in la hubiyo in ay si dhammaystiran uga hareen afkaarta iyo caqiiqada argagixisada muddo shan (5) sano ah.

CUTUBKA 3AAD: QABASHADA, LA WAREEGIDDA IYOXAYIRIDDA HANTI ARGAGIXISO

Qodobka 31aad: Xayyiraad Saarid Hanti

1. Xeer-ilaalinta ku shaqada leh, hanti-dhawraha guud iyo hay`adaha maaliyadeed ee dawladdu waxa ay maxkamadda awoodda u leh weydiisan karaan in ay xayiraad saarto muddo kooban ah, dhaqdhaqaaqa hanti looga shakiyey wax la xiriira argagixisanimo.
2. Cid kasta oo go`aanka xayiraadu saameeyo ama dhibbane u noqotana,waxaa u furan in ay maxkamadda weydiisato in xayiraadda laga qaadohantidaas, haddii ay caddaato in tallaabo qaldan la qaaday;
3. Amarka xayiraadda, waxaa ogaysiin laga siinayaa:
    a. Bangiyada, hay'adaha maaliyadda iyo kuwa ka ganacsada lacagacaha caddaanka ah;
    b. Cid kasta ee kale, oo dan sharci ah ugu jirto ama ay saamayn ku yeelanayso xayiraadu.

Qodobka 32aad: La-wareegid Hanti Argagixiso

iyada oon waxba loo dhibin xuquuqda cid kale oo niyad-san, haddii si waafaqsan Sharcigan dacwad argagixisannimo loo soo oogo, markasta oo ay Maxkamaddu fal-dembiyeedkaas ka soo saarto xukun kama danbays ah, ayna ciqaabta u dagsan xukunto, waxay kaloo xukumaysaa:

1. In lala wareego dhammaan hanti kasta oo loo adeegsaday fal argagixisanimo, fududayntiisa ama ay sugnaatay sababtiisa in lagu helay,xataa haddii hantidaasi cid kale ku wareegtay ama sidii ay markii hore ahayd laga dhalan rogay;
2. In lala wareego dhammaan hubka, agabka, walxaha qarxa iyo maaddokasta oo la adeegsaday ama ay muuqatay in la adeegsan lahaa, si fal- dembiyeedkaas loo sameeyo ama loo fududeeyo iyo dhammaan waxyaabaha samayntooda, haysashadooda, adeegsigooda ama ka ganacsigooda fal argagixiso laga samaynayo;
3. In lala wareego dhammaan hanti kasta oo uu leeyahay ama uu maamulo,loo hayo ama loo uruuriyey koox ama urur argagixiso ah iyo dhammaanama qaar hantida uu leeyahay qof argagixiso ah;
4. Haddii ay suuragal noqon weydo in hantidaas la qabto, waxa ay maxkamaddu

xukumaysaa ganaax lacageed oo u dhigma hantidaas lala wareegay;

5. cid kasta oo dhibbane u noqota ama ay dani uga jirto hantida la xukumayin lala wareego, waxaa u furan in ay rafcaan qaadato, si loo baajiyo go`aanka Maxkamadda, muddo 30 (sodon) maalmood gudahood ah oo kabilaabanaysa maalinta xukunka la riday;
6. Haddii, aan cid kale oo sheeganaysa aysan ka qaadan rafcaan sida ku xusan faqrada (kh) ee qodobkaan ama uu dhaco xukun Maxkamdeed oo kama danbeys ah; hantidaas waxaa yeelanaya dowladda.

CUTUBKA 4AAD: ASTEYNTA ARGAXIXISADA

Qodobka 33aad: Habraaca Asteynta Shaqsi ama Urur Argagixiso

1. Dalku waxaa uu yeelanayaa liis ay ku qoran yihiin shaqsiyaadka iyo ururrada ama hay'adaha argagixisada lagu asteeyey;
2. Wasaaradda Amniga Guduha, iyada oo ka anbaqaadaysa warbixinnada laamaha amniga, kaashanaysana hay`adaha la dagaallanka argagixisada, waxa ay diyaarinaysaa liiska kooxaha, ururrada iyo shakhsiyaadka argagixsada lagu tuhmay, asaga oo sababaysan ayna la socoto cadaymaha loo hayo, ayey wasaaraddu u gudbineysaa Golaha Wasiirrada;
3. Kadibna, Golaha Wasiirrada ayaa go`aan ku soo saaraya liiska kooxaha,ururada iyo shakhsiyaadka argagixisada ah;
4. Ururada, kooxaha, Hay'adaha iyo shakhsiyaadka lagu asteeyey argagixisannimada ama liiska argagixisanimo lagu daray iyo cid kasta oo dhibbane u noqota astayntaas, waxaa u furan in muddo soddon (30) maalmood gudaheed ah ay maxkamadda awooda u leh rafcaan u qaataan;
5. Xeer-ilaalinta iyo maxkamadaha awooda u leh ayaa wajiibkooda ka gudanaya liiska argagixisanimo, si waafaqsan Sharcigan;

Qodobka 34aad: Ka Saaris liis Argagixisanimo

Si liiska argagixisanimo looga saaro koox, urur ama shakhsi, waxaa la qaadayaa tallaabooyinka soo socda;

1. Wasaaradda Amniga Guduha, haddii ay ku qanacado ama ay tahay in koox, urur ama shakhsi laga saaro liiska argagixisanimo, sababo macquul ah oo soo kordhay owgood, waxa ay wasaaraddu u soo jeedinaysaa Golaha Wasiirrada codsi sababaysan oo ah in laga saaro liiska.

2. Golaha Wasiirada ayaana go`aan ka soo saaraya;

3. Goluhu wuxuu sanadkiiba mar ama markii kale ee loo baahdo, dib u eegis ku samaynayaa liisaska argagixisanimada;

4. Maxakamadda awoodda u leh ayaa amri karta in koox, shaqsi ama ururlaga saaro liiska argagixisanimada marka uu guuleysto rafcaanka ay kaqaateen ku darista liiska;

5. Cid kasta oo lagu asteeyey ama la galiyey liis argagixisoniimo, ayna dib kacaddaato in aysan asaas lahayn tuhunka keenay in lagu daro liiska, ayna ka soo gaarto waxyeello-sharafeed ama hantiyeed; wuxuu xaq u yeelanayaa raalli-gelin iyo mag-dhaw u dhigma dhibaatada gaartey oo ay bixiso Dowladda.

CUTUBKA 5AAD: AWOODDA DACWAD QAADISTA

Qodobka 35aad: Maxakamadda Awoodda u Leh Qaadidda DacwadahaKhuseeya Sharcigan

Maxkamadaha Ciidamada Qalabka Sida ayaa yeelanaya awoodda qaadista dacwadaha ka dhasha dembiyada argagixisada ee Sharcigani caddeynayo. Waxaana Maxkamadaas ka howlgalaya garsoorayaal, kaaliyaal iyo howl- wadeenno si gooni ah ugu tababbaran arrimaha la dagaalanka argagixisada.

Qodobka 36aad: Dacwad Oogaha

Xeer ilaalin Guud ee Ciidamada Qalabka Sida; ayaa yeelanaysa oogista,dhaqaajinta iyo baarista dacwadaha argagixisada. Xeer ilaalintaasna waxaa ka howlgalaya xeerilaaliyaal, baarayaal iyo kaaliyayaal si gaar ah ugu tababbaran arrimaha la dagaallanka argagixisada.

CUTUBKA 6AAD: AWOODAHA BAARISTA, WAARAN & CADEYMAHA

Qodobka 37aad: Qabasho iyo Baaris Waaran la'aan.

1. Qabashada qof ama dad lagu tuhmey argagixisanimo, waxaa sameyn kara; dhammaan Ciidamada Amniga ee u xil saaran sugidda amniga. waxaase leh awoodda xirista iyo baarist qof ama dad markii ay jirto sababcad oo maangal ah oo lagu tuhmo in uu galay ama isku dayayo in uu galo fal argagixiso; Saraakiisha Nabadsugidda Qaranka. Ha yeeshee, waa in qofka tuhmanaha ah lagu wareejiyo hay'adaha ku shaqada leh ama loo helaa xabsi xalaalayn muddo aan ka badnayn afartan iyo siddeed(48) saacadood gudahood.
2. Saraakiisha dembi baaristu, waxa ay geli karaan oo baaritaan ku samayn karaan Waaran la'aan guriga ama meesha uu ku nool yahay qofka la tuhmay oo ku xusan farqada 1-aad ee qodobkaan, waase in hay'adaha ku shaqada leh lagu wargeliyo muddo aan ka badnayn afartan iyo siddeed(48) saacadood gudahood kadib markii rabitaanka uu fulo waxay doodananayan waaran.

Qodobka 38aad: Awoodda Xirista iyo Siideynta

1. Qofka awood Sharcigan bixiyey lagu qabto, waa in la hor keenaa maxkamadda awoodda u leh muddo 48 saacadood gudahood ah oo aysanku jirin waqtiga loo soo waday maxkmadda.
2. Marka qofka la tuhunsan yahay la hor keenayo maxkamadda, sarkaalka amnigu wuxuu u gudbin doonaa cidda ku shaqada leh, warbixin kooban oo muujinaysa:
    a. Xaqiiqooyinka dacwadda iyo sababta xarigga;
    b. Guud ahaan caddaymaha la hayo iyo tilmaan guud oo ku saabsan baarista la sameeyey ilaa hadda iyo baarista la soo jeedinayo in la sameeyo;
    c. Sababaha lama-huraanka ka dhigaya in la sameeyo muddo-kordhin baariseed si la-tuhunsanaha loogu sii hayo xarunta baarista; iyo
    d. Tallaabo kasta oo la qaado hab waafaqsan arrimaha qodobkan ku xusan; waxaa sida ugu dhaqsiyaha badan lagu wargelinayaa, Xafiiska Xeer-ilaalinta ku shaqada leh iyo sidoo kale, sarkaalka qofka xiran u soo gudbiyey garsoorka.

Qodobka 39aad: Xarigga iyo Xabsi ku Haynta

1. Maxkamadda qofka xiran la horkeenay hab waafaqsan qodobka 37-aad iyo 38-aad ee Sharcigan, waxay amri kartaa xabsi ku hayn ku-meel-gaar ah si qofka la tuhunsan yahay loogu sameeyo baaris ka hor inta aan dacwad lagu soo oogin;
2. Maxkamad awood u leh ayaa oggolaan karta xarigga noocaas ah si baaris dheeri ah loogu sameeyo, marka ay codsi ka hesho hay`adaha dembi baarista ee kiiska ka shaqeynaya;
3. Waqti kasta oo baaris lagu sameynayo qofka la tuhunsan yahay si loo dhammeystiro baarista, waa in ayna ka badnaan sagaashan (90) maalmood, waana in si joogta ah maxkamadda lagu wargeliyo halkabaaristu marayso, iyadoo maxkamadda laga codsan karo muddo- kordhin hal mar ah;
4. Markii aanay jirin sabab macquul ah oo lagu aamino in qofka la tuhunsan yahay ku kacay ama ku lug lahaa fal argagixiso, isla markaana aanay jirindacwad lagu soo oogay muddo saddex(3) bilood gudahood ah laga soo billaabo taariikhda amarka xarigga; Maxkamaddu waxay amri kartaasiidayntiisa;
5. Si kastana, eedaysanaha lama hayn karo lix(6) bilood ka badan, ayadoon lagu soo oogin wax dacwad ah, laga billaabo markii la sooxiray.

Qodobka 40aad: Hay'adda Awooda u Leh Bixinta Waaranka

Maxkamadda awoodda u leh ee ku xusan qodobka 35-aad ee Sharcigan, ayaa bixinaysa Waaranka lagu xirayo, lagu kordhinayo muddada haynta tuhmanaha ama eedaysanaha. Waana in codsi hayn ama xabsi kordhin ah la weydiisto maxkamadda, muddo aan ka badnayn afartan iyo siddeed(48) saacadood.

Qodobka 41aad: Baarista Gaadiidka iyo Rakaabka Saaran

Saraakiisha Hay'adaha amniga ayaa leh awoodda in lahakiyo lana baaro baabuurta, rakaabka iyo wax kasta oo saaran ama ku rakiban gaadiidka.

Qodobka 42aad: Baaritaanka Dadka lugaynaya

Awoodda baaritaanka Sharcigan ku xusan, waxaa iska leh sarkaal kasta oo ka tirsan Hay'adaha Amniga in uu joojiyo qof ama dad lugeynaya meel gaar ah ama aag si gaar ah loo xusay iyo sidoo kale, in la baaro waxkasta oo abuuri kara shaki argagixiso.

Qodobka 43aad: Oggolaashaha Caddeymaha Elektroonigga iyo Hababka Casriga ah

Habraac ama fal-dembiyeed kasta ee ku saabsan Sharcigan, Caddeymaha danabeysan ama daabacan sida muuqaallada, sawirrada, codadka, qoraallada, tixraacyada xiriirka la leh tiknoolajiyada iyo wixi la mid ah, marka ay Saraakiisha dembi baaristu hubin dhammeystiran ku sameeyaan, isla markaana ay xaqiijiyaan; caddeymaha noocaas ah garsoorku waa in uu u tixgaliyo in ay yihiin caddeymo go'aan garsoor lagu qaadan karo.

Qodobka 44aad: Oggolaanshaha Guud ee Adeegsiga Nuqullada

Habraac ama fal-dembiyeed kasta ee ku saabsan Sharcigan, dokumentikasta oo loo oggolaan karo in uu caddeyn galo marka la soo saaro, nuqul kasta ama wax kasta oo laga soo dheegtay dokumentigaasi wuxuu noqon karaa mid caddeyn gala iyadoo shuruuduna noqonayso in uu yahay nuqul la hubiyey ama dheegasho ama loo shardiyeeyo in uu saxiixay oo caddeeyey dhabnimadiisa sarkaalka nuqulka asalka ah lagu aaminay, iyadoo looga baahan yahayna sarkaalkaas in uu siiyo nuqul la caddeeyeyama dheegasho qof kasta oo ku dalbada muddo macquul ah gudaheed.

Qodobka 45aad: Caddeyn Marqaati Khabiir

1. Iyada oo la raacayo sida ku cad qodobbada 157 ilaa 161 ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed, ee la xiriira aragtida(fikradda) khabiirka, dacwad kasta oo la xiriirta oo ay su'aal ka timaado in shay ama walxaha sida: hub, shucaac, kiimiko sun ah iyo bayooloji ama wixii halis ah oo la mid ah walxaha la soo sheegay.

2. Waxay noqon doontaa cadeyntaasi mid la oggolaado, iyada oo aan u baahnayn saxiix ama mas'uul awoodda qofka ama in qofkaasi saxiixay hor yimaado maxakmadda, waana

in haddii aysan jirin cadeyn kale oo kasoo horjeeda loo tixgeliyo cadeyn ku filan waxa ay sheegtay

Qodobka 46aad: Xafidaadda Caddeymaha Baaritaanka

Qofka mas'uulka ka ah baaritaanka waxaa uu qabanayaa wax kasta oo loo arkoin fal argagixiso loo isticmaali karo, waxaana walxaha la qabtay oo laga shakiyey lagu wareejinayaa xarunta baarista ee ay raacsantahay cidda baarista samaysay, iyada oo warbixin dhammaystiran la raacsiinayo oo ku saabsan sababaha shakiga abuuray.

Qodobka 47aad: Hor-qabateynta Adeegga Isgaarsiinta

1. Markii, maxkamadda awoodda u leh loo soo gudbiyo codsi ku saabsan hor-qabateynta adeegga isgaarsiinta, ayna maxkamaddu ku qanacdo maangalnimada codsigaas; waxaa la bixinayaa oggolaansho lagu fasaxayo ama lagu farayo qofka, shirkadda ama hay'adda ay ku socoto ay hubiso mid ama ka badan oo arrimaha soo socda ah:
    a. Hor-qabateyn la sameeyo inta uu socdo xiriirka loo adeegsanayo adeegga boostada ama nidaam isgaarsiineed, xiriirka ku tilmaaman oggolaanshaha;
    b. Bixinta kaalmo loo samaysnayo dal soo codsday in laga caawiyo in hor-qabateyn lagu sameeyo xiriir isgaarsiineed sida ku xusan heshiiska caalamiga ah ee is-garabsiga; ama
    c. daah-furka wax kasto oo lagu helay ee dhexgal la ogolaaday ama lagu dalbay ogolaashaha dhexgal xog xeriirkeeda oo nooc kasta ah
2. Haddii, degdeg loogu baahdo hor-qabatayn ama dhexgal, waxaa dalbashada saxiixaya Taliyaha Hay'adaha Nabadsugidda, iyadoo codsiga lagu muujinayo sababta degdeg ka dhigay codsiga balse, waa in uu 24 saac gudahood ku oggolaato Maxkamadda awoodda u leh.
3. Haddii, aysan maxamaddu oggolaan marka oggolaashaha la weydiisto muddo labaatan iyo afar (24) saac gudahood,caddeymaha lagu helay hor-qabatayntaas ama dhexgalkaas looma isticmaali karo caddeymo ahaan maxkamadda horteeda;

4. Garsooruhu ma bixinayo oggolaanshaha ku xusan farqada 1-aad iyo 2-aad haddii aanu ku qanacsanayn;
    a. in ogolaanshuhu uu danaynaayo amniga qaranka ama loo adeegsanayo ka hortagga ama ogolaashaha dambiyo halis ah ama leh ujeedo lagu ilaalinayo danaha qaranka.
    b. In oggolaanshuhu u danaynayo amniga qaranka ama loo adeegsanayo ka-hortagga ama ogaanshaha dembiyo halis ah ama leh ujeeddo lagu ilaalinayo Danaha Qaranka; iyo
    c. In waxa lagu oggolaaday ama oggolaanshuhu noqdo mid u qalma wixii la rabay in lagu gaaro;
5. Xog dhawrsan oo lagu helay dhexgal ama hor-qabateyn sharci ah oo laxiriira waxyaaba qarsoodiga u ah qof, waa in ay ahaadaan kuwa dhawrsan oo aan la faafin karin, loona adeegsan karin ujeeddo ka baxsanmiddii oggolaashaha lagu helay;
6. Oggolaansho dhexgal isgaarsiineed waxaa lagu bixin karaa oo keliya haddii mas'uuliyiinta hay'adaha amniga magacooda lagu soo codsado;
7. Codsiga waa in lagu qeexo tilmaanta xiriirrada la rabo in dhexgal ama hor-qabateyn lagu sameeyo, faahfaahinta cidda adeegga isgaarsiinta bixisa iyo sharraxaad ku saabsan sababta dhexgalkaasi muhiim u yahay. Codsiga waa in sidoo kale, lagu daro ballanqaad ah in wixii xog ama war ah ee lagu helo dhexgalka ama hor-qabateynta loola macaamilayo habwaafaqsan Sharcigan.
8. Haddii, nuqul oggolaanshahaas ah loo geeyo qofka ku xusan oggolaanshaha, qofkaas nuqul isla oggolaanshahaas ah wuxuu u geyn karaa cidda la is-leeyahay gacan ayey ka geysan kartaa arrinta.
9. Waxay noqonaysaa mas'uuliyadda qofka ama hay'adda oggolaanshahala siiyey inuu qaado tallaabooyin lagu dhaqan-gelinayo oggolaanshahaashadba sidii suuragal ah;
10. Adeeg bixiyayaasha, waxaa waajib ku ah in ay gacansiiyaan saraakiishasharci fulinta, ayna oggolaadaan taageero farsamo, marka saraakiishu la timaado amarka maxkamadda ama Taliyaha Nabadsugidda haddii xaaladdu deg deg tahay sida ku xusan farqada 2-aad ee qodobkan;

11. Ogolaanshaha dhexgalka ama hor-qabateynta wuxuu shaqaynayaa muddo saddex (3) bilood oo keli ah oo marka ay dhammaato loo baahanyahay in 14 kii maalinba laga codsanyo kordhis maxkamada awoodda uleh, iyadoo ku dari karta saddex(3) bilood oo kale haddii codsi ay hesho,kadib markii ay maxkamaddu ku qanacdo in kordhinta la codsaday ay tahay mid muhiim u ah baarista;
12. Waxay noqonaysaa mas'uuliyadda codsadaha in uu hubiyo in:
    a. Tirada dadka xogta la helay la tusay ama loo daah-furay;
    b. Ilaa xadka xogta la helay la baahiyey ama la wadaagay;
    c. In lagu koobo inta ugu yar ee u muhiimka ah ujeeddadii loo oggolaadayisla marka xogtaa la ururiyey ay dhaafto goortii ay muhiimka ahayd, waa in la baabi'iyo nuqul kasta lana tirtiro.
13. Codsadaha waajib kama saarna in uu buuxiyo shuruudaha ku xusan farqada 1-aad (b) iyo (t) haddii lagu wareejiyo xog dawlado shisheeye iyohay'ado amni ee caalami ah laga helay, wuxuuse xil ka saaran yahay in uu fiiriyo in dowladahaas leeyihiin shuruudo noocaas ah iyo in ay leeyihiin dhawrsanaanshaha ku sugan faqradda 4-aad, marka la fiirinayo in loo daah-furo xogta dhexgal ka loo galay maamulkaas shisheeye.
14. Xog kasta oo lagu helay dhexgal xiriirna la leh dacwad waxaa loo adeegsan karaa caddeyn ahaan maxkamadda horteeda.
15. Sarkaal baaris ama qofkii kale oo faafiya "Xog Dhowrsan" waxaa uu galayaa fal-dembiyeed waxa uuna mutaysanayaa ciqaab si waafaqsan qawaaniinta dalka.

Qodobka 48aad: Qaadista Astaamaha Faraha Iyo Muunadaha

1. Markii, loogu baahdo maxkamadaynta owgeed, eedaysanaha waxaa laga qaadi karaa; raadka iyo muunadda faraha, dheecaanka, dhiigga, timaha, cidiyaha iyo dhammaan raadadka iyo muunadaha laga qaado ama uu reebo qeyb kasta oo jirka Aadanaha ka mid ah; isla markaana waxaa loo tixgalin karaa caddeyn ahaan.
2. Haddii, qofka xiran aanu ahayn qof qaangaar ah si waafaqsan 29-aad, faqradda 8-aad ee Dastuurka; waa in maxkamadda laga helo oggolaansho gaar ah.
3. Qofka la tuhunsan yahay waa in lagu wargeliyo in muunadda laga qaadayo loo adeegsan doono baaris fal-dembiyeed ama caddayn ahaan.

4. Muunad kasta oo laga qaadayo qof eedaysane ama tuhmane ah waa in uu qaadaa cid xirfad u leh una idman.
5. Raadadka ama muunadaha loo qaaday si waafaqsan qodobkaan iyo xog kasta oo laga helay; waa la haynayaa, cidina uma adeegsan karto ujeeddo ka duwan baarista argagixiso.

Qodobka 49aad: Hubinta Dekadaha iyo Xudduudaha

1. Haddii qof ku lug leh ama lagu tuhmay fal argagixiso ama fududeynta fal aragagixiso oo ku sugan dekad, garoon diyaaradeed ama meel xad ah, markab dushiis ama diyaarad dusheed; saraakiisha amnigu waxa ay awood u leeyihiin in ay tuhmanaha la yeeshaan wareysi baariseed ama in tuhmanaha laqabto.
2. Qofka uu wareystay sarkaalka amni, waxaa waajib ku ah in uu:
    a. siiyo sarkaalka amniga xogta ama dokumiinti kasta oo uu hayo eesarkaalkaasi codsaday;
    b. siiyo sarkaalka amniga marka uu codsado baasaaboor shaqeynaya oo sawir wata ama dokumenti kale oo sugaya aqoonsigiisa.
3. Qofka uu qabtay sarkaalka amni, haddii aan awood kale lagu xirin, waxaa lagu sii daynayaa muddo aan ka badnayn sagaal(9)saacadood marka laga billaabo goortii hubintiisu billaabatay.
4. Sarkaalka amnigu waxa uu awood u leeyahay in uu baaris ku sameeeyo markab ama diyaarad iyo wixii saaran ama wax kasta oo uu rumaysan yahay in ay markabka ama diyaaradda saaran yihiin.
5. Sarkaalka baaraha ah ee su'aalaha weydiinaya qof, si uu u go'aamiyo in uu yahay qofka ku lug lahaa diyaarinta, fulinta ama fududaynta falka argagixiso; waxa uu baaris dhammaystiran ku sameyn karaa wax kasta oo qofka u saaranama la saarayo diyaaradda ama markabka.
    a. Alaabta uu qabto ama ka shakiyo sarkaalka baarista waxa uu hayn karaamuddo aan ka badnayn soddoba(7) maalmood oo ka billaabanaysa maalinta qabashada alaabta.

b. Qofka wuxuu noqonayaa mid xad-gudub sameeyey haddii uu si ula-kac ahu hor-joogsado ama u carqaladeeyo baarista ama hubinta ku sugan Qodobkan waxaanu noqonayaa mid mutaysta ciqaab xabsi oo gaareysalaba(2) sano.

Qodobka 50aad: Sugidda Aqoonsiga Eedaysanaha

1. Sarkaalka amni ee baarista ku jira, ayaa awood u leh: sawir ka qaadista, cabiridda qofka xiran iyo sugidda aqoonsigiisa;
2. Faqradda 1-aad ee qodobkaan "sarkaal amni" waxaa loola jeedaa: cid kasta oo sarkaal amni ah oo oggolaasho ka haysata hay'ad awood qaanuuni u leh bixinta oggolaasho ceynkaas ah.

CUTUBKA 7AAD: ISKAASHIGA CAALAMIGA AH EE ARRIMAHA DEMBIYADA ARGAGIXISAGA LA XIRIIRRA

Qodobka 51aad: Iskaashiga Dalalka kale Arrimaha Dembiyada Argagixisada

1. Dowladda Soomaaliya waxa ay la shaqeynaysaa dalalka kale xagga is-dhaafsiga macluumaadka, qabashada baaritaanka, dacwad-ku qaadidda la xiriirta dembiyada argagixiso ee xuduudaha ka tallaaba, iyada oo ujeedadu tahay in si ku meel gaar ah loo qabto tuhmanayaasha sababo amni dartood, la wareegidda hantida, lacagaha iyo hantida la xiriirta lacagta la dhaqay iyo maalgelinta argagixisada, isu-celinta iyo iskaashiga farsamo.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobbada heshiisyada iyo axdiyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya dhinaca ka tahay ee ku aadan is-dhaafsiga dembiilayaasha; garsoorka dawladda ee arrimaha dembiyada argagixisada khuseeya, wuxuu is-kaashi iyo xiriir la yeelanayaadhinacyada garsoorka shisheeye, asagoo raacaya qodobbada Sharcigan.

Qodobka 52aad: Ujeeddada Codsiga Iskaashiga

Codsiga iskaashi sharciga ee dhex maraya labada dhinac, lana xiriira dembiyada uu xeerinayo Sharcigan, waa in loo fuliyaa si waafaqsan mabaadi'da lagu qeexay Sharcigan. Iskaashiga waxaa ka mid noqon kara:

1. Ururinta caddaymaha iyo macluumaadka dadka iyo oggolaansho in lalakulmo dadka

baaritaanku ku socdo si loola socdo qaabka baaritaanku udhacayo;

2. Bixinta dukumeenti kasta oo garsoor iyo fulinta baaritaannada iyo la wareegidda hantida iyo walxaha kale;
3. Baarista walxaha iyo booqashada goobaha, bixinta macluumaadka iyo wixii caddeymo ah;
4. Bixinta dokumintiyada asalka ah iyo nuqullada oo ay ku jiraan dukumentiyada rasmiga ah, warqadaha bangiga, waraaqahaxisaabaadka iyo diiwaannada muujinaya howlaha ganacsi.
5. Dhaqan gelinta go'aannada ururrada ay Soomaaliya xubinta ka tahay eeku saabsan la dagaallanka Argagixisada.

Qodobka 53aad: Diididda Codsiga Iskaashiga

Codsiga wada shaqaynta waxa kaliya oo la diidi karaa marka:

1. Ay u badan tahay in ay wax u dhimayso nidaamka dowliga ah, madax-bannaanida, amniga ama mabaadiida asaasiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Hay'adda codsanaysa oo aan ahayn mid awood qaanuun u leh in ay codsiga soo gudbiso, marka la raaco sharciga dalka codsanaya;
3. Xaqiiqooyinka uu codsiga ku salaysan yahay oo maxkamad Soomaaliyeed oo awood u leh ay horay si kama dambays ah go'aan uga gaartay.
4. Dembiga uu codsiga ku salaysan yahay oo aan dembi ka ahayn Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama aan la wadaagin wax astaamo ah dembi ku jira qawaaniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
5. Tallaabooyinka la codsaday ama tallaabooyinka kale ee la midka ah oo aan lagu oggolayn sharciyada dhaqangalka ka ah dalka Soomaaliya ama dembiyada codsigu ku salaysan yahay marka la raaco qawaaniinta Soomaaliya;
6. Go'aankii oo waddan kale ka soo baxay, oo qaabka uu u soo baxay uuna bixinayn dammaanad ku filan oo ku saabsan xuquuqda difaaca eedaysanaha;
7. Haddii ay jiraan sababo la taaban karo oo lagu rumaysan karo in ujeeddada codsiga dacweynta ama ciqaabta loo sameeyey ku saleysantahay jinsi, isir, diin, dhalasho, asal ama fikradaha siyaasadeed;

8. Dowladda Soomaaliya waa in ay isla markiiba si qoraal ah ugu gudbisaa dii dmada codsiga, dalka uu codsigu ka yimid, ayadoo raacinaysa sababaha diidmada codsiga.

Qodobka 54aad: Codsi Tallaabo Ilaalin Ku-meel-gaar ah

1. Haddii ay dhacdo in waddan shisheeye uu ka codsado Soomaaliya in ayqaaddo tallaabo ilaalin ku-meel-gaar ah, maxkamadda awoodda u leh ayaa amri doonta tallaabooyinka waafaqsan qawaaniinta dalka.
2. Haddii codsiga loo qoray si guud, maxkamadda awoodda u leh waxa ayku dhawaaqi doontaa tallaabooyinka ilaalinta ugu habboon oo waafaqsan sharciga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Haddii ay dhacdo in tallaabooyinka la codsaday aan laga helayn sharciyada Soomaaliya , maxkamada awoodda u leh ayaa ku badeli karta tallaabooyin ku habboon ee ku xusan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 55aad: Codsi soo Gacan-gelin Eedaysane

1. Codsiyada isu gacan-gelinta dadka la raadinayo ee ka yimaada dalalka shisheeye oo khuseeya dembiyada Sharcigan daboollayo ama hirgelin go'aanno garsoor oo dembiyadaas la xiriira; nidaamyada iyo mabaadi'da lagu sheegay heshiiska isu gacan-gelinta oo dhaqangal ah oo u dhexeeya dowladda codsiga soo gudbisey iyo Jamhuuriyadda FederaalkaSoomaaliya ayaa la dabbaqayaa.
2. Haddii uusan jirin heshiis isku gacan-gelin sida ku xusan farqada 1-aad isu- celinta waa in la fuliyo iyadoo lagu salaynayo xiriirka wanaagsan oo Soomaaliya kala dhexeeya dalka codsiga soo gudbiyey iyo haddii danahaSoomaaliya loogu baahdo.
3. Sida ku cad shuruudaha Sharcigan, isku gacan-gelinta dembiilaha waa inla fuliyo oo keliya marka dembiga keenay codsiga isu gacan-gelinta uu dembi ka yahay labada sharci ee dalka codsanaya iyo Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Qodobka 56aad: Sababaha lagu Diidi Karo Gacan-gelin Eedaysane

Codsiga isku gacan-gelinta eedaysanaha ma noqon doono mid la fuliyo haddii:

1. Qofka codsiga isku gacan galinta lagu dalbanayo yahay, qof Soomaali ah;

2. Ay jiraan sababo maangal ah oo la aamini karo in sababta qofka loo dacweynayo ama loo ciqaabayo ay tahay sababo la xiriirra isirkiisa, diintiisa, dhalashaddisa, asalkiisa, fikradaha siyaasadeed, jinsiga ama naftaqofkaas laga yaabo in ay qatar gasho sababahaas owgood;
3. Xukun kama dambeys ah ay arrinka codsigu ku saabsan yahay ka gaartay maxkamad Soomaaliyeed;
4. Qofka la raadinayo dhiibistiisa uu muddo-dhac ku yimid dembiga loo haysto, marka la raaco sharciga dalka codsiga soo gudbiyey ama cafis loo fidiyey;
5. Qofka la raadinayo dhiibistiisa loo geystay ama laga cabsanayo in loo gaysto jirdil iyo ficillo kale oo naxariis darro ah ama si bini'aadantinimada ka baxsan oo bahdil ah loola dhaqmayo;
6. Qofka la raadinayo dhiibistiisa uuna heli doonin dammaanad qaadka dacwadaha dembiyada sida ku qoran qodobka 14 ee heshiiska caalamiga ah ee ku saabsan Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda;
7. Dacwad ku saabsan dembiga codsiga gacan-gelinta khuseeyo ayaa ka socota maxkamad dalka Soomaaliya;
8. Haddi, codsiga gacan-gelinta uu khuseeyo fulinta amar maxkamadeed oo kama dambeys ah oo qofka dhiibistiisa la codsanayo lagu xukumay isaga oo aan goobjoog ahayn oo aan helin fursad uu isku difaaco sababoka baxsan awooddiisa.

CUTUBKA 7AAD: QODOBBO GABAGABO AH

Qodobka 57aad: Mudnaanta Sharcigan

Sharcigan, oo si gaar ah u khuseeya arrimaha argagixisada; wuxuuna mudnaanta ka yeelanayaa, wixii sharci ah oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin arrimaha Sharcigan xeeriyey.

Qodobka 58aad: Dhaqangalka Sharcigan

Sharcigan waxa uu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda Federaalka ee Soomaaliya.

Lifaaqa 1aad:

Ururada ama kooxaha Argagixiso ee dowladda Federaalka Soomaaliya aqoonsan tahay waxaa ka mid ah :

1) AL-shabaab;
2) Daacish /ISIS;
3) Al-qaacida iyo Ururada iyo kooxaha ka farcamay ee ku afkaarta ah;
4) Urur ama koox kasta oo ay Xukuumada Federaalka Soomaaliya u aqoonsato Argagixiso

SHARCI LR.008 **Taariikh: 20 Maarso 2023**

OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALLUUMEYSIGA SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0254/B11/23**, ku taariikheysan **19/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Hgg-052-23
TAARIIKH: 20/3/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA

SHARCIGA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALLUUMAYSIGA SOOMAALIYEED

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
12 MAR 2023
SOO GELID/RECEIVED

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

CUTUBKA 1-AAD

HORDHAC

Waa Sharci lagu ilaalinayo Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga, kalluun beerista iyo howlaha la xiriira Kalluumeysiga waara ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xeer-xeyndaabkeeda gaarsiisan yahay, iyo Maamulka howlaha Kalluumeysi ee muwaadiniinta ka baxsan jamhuuriyadda,sidoo kale wuxuu sharcigan waajibaad fulin siinayaa dhammaan heshiis-yada heer gobol iyo kuwa caalamiga ah.

Qodobka 1
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa **Sharciga Horumarinta iyo Maaraynta Kalluumaysiga Soomaaliyeed.**

Qodobka 2
Erey Bixin

(1) Sharcigan, Haddii aan si kale loola jeedin ereyadiisu waxa ay lahaan doonaan macnaha soo socda:

"***Sharci***" waxaa loola jeedaa Xeer, ay ku jiraan shuruuc iyo nidaamyo kale iyada oo loo adeegsanayo si sharci ah;

"***Diyaarad***" waxaa loola jeedaa aalad kasta oo awood u leh in ay hawada sare ku duusho, aaladahaas oo ay ku jiraan kuwa duuliyaha leh iyo kuwa aan duuliyaha laheyn;

"***Hannaanka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah***" waxaa loola jeedaa nidaamka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee uu ansixiyay Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga iyada oo la raacayo habraacyadiisa, kaas oo si sharci ah Soomaaliya qeyb uga tahay;

"***Codsade***", marka la eego codsi ruqsad, oggolaansho ama fasax, waa qof kasta oo arji soo qorta isaga oo ku hadlaya magaciisa, magaca ururkiisa ama shirkadiisa'

"***Kalluun-beeris***"waxaa loola jeedaa abuuridda, beerista ama beerashada kalluunka, waxaana ka mid ah beeridda ukumo, ugxan ama abuur, ama keenidda kalluun meel kale laga soo qaaday ama Soomaaliya laga dhoofiyay, ama habab kale oo la mid ah, iyo ururinta iyo haynta kalluunka nool, waxaana ka mid ah ku-tallaalidda xayawaan badeedka badda dhexdeeda;

"***Kalluumeysatada yaryar***" waxaa loola jeedaa kalluumeysi dhaqameed ay muwaaddiniin Soomaaliyeed ku leeyihiin soohdinta Kalluumeysiga u xiran, ama aag Kalluumeysiga u go'an;

"***Doonyaha Yaryar ee kalluumeysiga***" waxaa loola jeedaa doon kasta oo kalluumeysi, huuri, doon yar ama mid aan mug weyn laheyn, kana yar 12 mitir, taas oo matoor leh ama aan lahayn loona adeegsado farsamada kalluumeysiga;

"***Qalab elektaroonig ah oo isku xiran***" waxaa loola jeedaa qalab ama nidaam kasta oo loo isticmaali karo in lagu helo, lagu raadsado ama si kale loola socdo gabbaad-kalluumeedka (Fish Aggregated Device) - FAD

"***Markab Ruqsad Haysta***", Waa markab kalluumeysi oo ka diiwaan gashan ruqsadna ka haysta Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah iyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga iyo kuwa caalamiga ah.

"***Sarkaal idman oo kalluumeysi***" waxaa loola jeedaa qof loo xilsaaray howl gaar ah oo kalluumeysi;

"***Nidaamka Aqoonsiga Tooska ah (Automatic Information System -AIS)***waxaa loola jeedaa Aalad elektaroonik ah oo lagu aqoonsado maraakiibta kalluumeysi ee badda kujirta oo ku xiriirsan dayax gacameedka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

"***Mulkiile***" waxaa loola jeedaa qofka ama shirkadda iska leh markabka ama doonta.

"***Kala duwanaanshaha noolaha***" waxaa loola jeedaa kala duwanaanta ka jirta dhammaan noolayaasha oo ay ka mid yihiin, berri-ku-nool, biyo-ku-nool iyo qaababka kale ee noolaha ku jira badda iyo kuwa berriga ku nooli isugu xiran yihiin;

"***Baaris cilmiyeed***" marka la eego waxqabadyada hoos **imaanaya** sharcigan waxaa loola jeedaa raadin nidaamsan oo loogu talagalay horumarinta ilaha cusub ee isku-darka kiimikada, hiddo-wadayaasha, noolaha yaryar, nafaqeeyayaasha yar yar, iyo badeecooyinka kale ee qiimaha leh ee kalluunku ka mid yahay iyo raadinta ilaha wax soosaar qiime leh ee kalluunka.

"***Gadasho***" ama "**soo gadasho**" waxaa ka mid ah:

(a) beddelasho ama isku day inaad wax ku beddelato;

(b) Soo gadasho ama isku day inaad wax soo gadato;

(c) ganacsi ama isku day inaad ganacsato;

(d) Guddoomid si loo diro, loo gudbiyo ama loo iib-geeyo;

"***Kalluun Aan Loo Qasdin***" waxaa loola jeedaa qaar ka mid ah kalluun ama xayawaan badeed kale oo si lama filaan ah dabinka u soo gala inta hawsha kalluumaysigu ay socoto, waxaana ka mid noqon kara:

a) Xayawaan badeed ka duwan noocyada la doonayey;
b) Xayawaan badeedka aan la dooneyn waxaa lagu sheegay Hannanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga ah, ruqsadda la adeegsan karo ama qorshaha maaraynta kalluumaysiga;
c) xayawaan badeedka aan qaan-gaarin ama dheddig oo jillaabashada laga mamnuucay;
d) kalluun si lama filaan ah ugu waxyeeloobay qalabka kalluumeysiga inta hawshu socotay oo aan la qaadan karin;
e) kalluun loo qasday balse warshadaha kalluunku ay diideen sababo la xiriira;
i. Xajmiga kalluunka oo aad uga yar daasadahooda ama cabbirka laga rabo suuqyada kale ee dibedda;
ii. waxyeello gaartay inta lagu jiro raridda iyo dejinta, taas oo keeni karta in laga diido suuqyada maxaliga ah arrimo la xiriira tayadiisa

"***Cad/Hilib***" marka laga hadlayo libaaax-badeedyada waxaa loola jeedaa dhammaan qaybaha libaax-badeedka marka laga reebo dhagaha, madaxa iyo uur-ku-jirta;

"***Agaasime Guud***" waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee JFS;

"***Kireyn Markab***" waxaa loola jeedaa markab sifo sharci ah ku diiwaangashan oo mulkiilihii/shirkadda lahaa markabka uu ku wareejiyey kireyste muddo cayiman.

"***Maxkamad***" waxaa loola jeedaa maxkamad awood sharciyeed ku leh Soomaaliya;

"***Aalad xog ururin***" waxaa loola jeedaa Aalad kasta oo biyaha dul sabbaysa, ama meel ha ku xirnaatee, taas oo ay hawlgeliyaan hay'ado dawladeed ama hay'ado la aqoonsan yahay cilmibaaris oo ujeeddadeedu tahay inay qaab elektiroonig ah xog u ururiyaan una cabbiraan xogta deegaanka, taas oo aan loogu talo gelin hawlo kalluumeysi;

"***Xoorid***" waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah wixii la soo jilaabtay oo xumaada baddana lagu tuuro;

"***Qalab***" marka laga hadlayo Aalad kasta oo ku xiran markabka;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

"***Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah*** "waxaa loola jeedaa aagga badda ee 24nm ku xigga marka xariiqda asaasiga lagasoo tiriyo xeebta dalka oo gaareysa 200 mayl-badeed.

"**Kalluun**" waxaa loola jeedaa noole kasta oo badda dhexdeeda ama biyo ku nool ah.

"**Aalad Gabbaad kalluunka**" ama waxaa loola jeedaa Aalad ka kooban **walxo** badan oo la isku xirxirey loona ekeesiiyey qar-badeed si kalluunka ugu soo ururo **ugana** dhigto gabbaad.

"***Wax soo saarka kalluunka***" waxaa loola jeedaa wax kasta oo ka yimaada kalluun, qayb ahaan ama gebi ahaanba la habeeyay/diyaariyay;

"Aagga dhaqaalaha Gaarka ah ee Kalluumeysiga" waa aag dhaqaaleedka Gaarka ah ee Soomaaliya oo ku teedsan aagga u xadaysan Kalluumeysiga wuxuuna ku fidsan yahay badda ilaa 200 mayl-badeed.

"Aagga Dhawran ee Kalluumeysiga" waa biyaha aag dhaqaaleedka gaarka ah ee Soomaaliya ee ku xiga biyo xeebeedka ama aagga xaddidan, isla markaana ku fidsan ilaa 24 mayl-badeed.

"Aagga Xaddidan ee Kalluumeysiga" waa biyo xeebeedka Soomaaliya oo ka bilaabanaya xariiqda asaasiga ah ee toosan gaarsiisanna 12 meel-badeed.

"***Kalluumeysi"*** waxaa loola jeedaa ka kalluumaysiga:

a) hal ama in ka badan oo badeeco kalluun ah, ama qaybahiisa, taas oo ujeeddadu tahay maareyn iyo ilaalin, iyada oo la tixgelinayo juqraafi ahaan, cilmi ahaan, farsamo ahaan, dhaqan ahaan, madadaalo ahaan, dhaqaale ahaan iyo astaamo kale oo la xiriira ama

b) kalluumeysi kasta oo badeeco ah.

"Kheyraadka kalluumeysiga" waxaa loola jeedaa kalluun, kalluumeysi, badeecooyin kalluun, noocyo kalluun, degaan kalluun iyo kalluunka qeybihiisa kala duwan;

"***Badeeco Kalluun***" waxaa loola jeedaa tiro kalluun ah, oo isugu jira sinjiyo kala duwan oo negi ama dool ah.

"***Markab kalluumeysi oo Weyn***" waxaa loola jeedaa markab kalluumeysi oo sagxad leh oo gudaha ku wata matoor ama matooro markii la isu geeyo aan ka xoog yarayn 100 faras(HP-Horse Power), markabkaas oo dhererkiisu gaarayo ugu yaraan 24 mitir ama ka weyn.

"***Calan Dawladeed***" waxaa loola jeedaa dowladda uu markabku sharciyadda ka haysto.

"***Markab kalluumeysi shisheeye***" waxaa loola jeedaa markab kasta oo aan Soomaaliya laga laheyn;

"***Agab Kalluumeysi***" marka laga hadlayo kalluumeysiga waxaa loola jeedaa qalab kasta, ama iskugeynta aalado badan oo loo adeegsan karo kalluumeysiga; kuwaas oo ay kamid yihiin; shabaagta, xargaha, dabinnada, maqaalinta, gabbaad kalluumeysi, wiish-gacmeedka, doonta, qalab-farsamooo markabka ama diyaradda la saaro, diyaarad duuliye leh ama aan laheyn ama gawaari loo adeegsado hawlaha kalluumeysiga;

"***Hidde-side***"**(Genetic resource)**waxaa ka mid ah unugyada walxaha noolaha ah ee kujiraan astaamo waxtar u leh isirka noolaha.

"**Dowlad**" waxaa loola jeedaa Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

"Kalluumeysi sharci darro ah" Waxaa loola jeedaa kalluumeysi aan sifo sharci ah loo marin jilaabashadiisa.

"***Markab kalluumeysi oo Weyn***" waxaa loola jeedaa markab kalluumeysi oo sagxad leh oo gudaha ku wata matoor ama matooro markii la isu geeyo aan ka xoog yarayn 100 faras(HP), markabkaas oo dhererkiisu gaarayo ugu yaraan 24 mitir ama weyn.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

"Baare" waxaa loola jeedaa qof kasta oo lagu magacaabay ogaansho tirada iyo noocyada kalluunka ee markabu jilaabtey.

"***Booyad qalabaysan***" waxaa loola jeedaa booyad heehaabaysa oo uu ku xiran yahay gabbaad kalluumeed, taas oo leh lambar tixraac oo lagu aqoon

sado una qalabeysan hab daba-gal oo dayax gacmeedka ay kula haysato si loogala socdo meesheeda;

"***Heshiis caalami ah***" waxaa loola jeedaa is **afgarad** ama **heshiis** ka dhaxeeya dowlado iyo ururo caalami ah qaybna ka tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaaliya.

"***Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga ah***" waxaa loola jeedaa talaabo kasta oo sharci ahaan waajib ah in la ilaaliyo ama la maareeyo mid ama in ka badan sinjiyada noole biyoodka ah ee ay ansixiyeen ayna fuliyeen ururo goboleed iyo kuwa caalami ah oo maareeya noole biyoodka.

"***Markab shirko ah***" waxaa loola jeedaa markab ay wadaagaan labo qof iyo in ka badan.

"***Dejin***" waxaa loola jeedaa in deked ama marso laga soo dejiyo kalluun ama wax soosaar kalluun.

"***Wasiir***" waxaa loola jeedaa wasiirka Wasaaradda kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee Dawladda Federaalka ee Soomaaliya;

"***Wasaarad***" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;

"***Qalabka xog-gudbinta ee guurguura***" waxaa loola jeeda; aalad lagu rakibo markab dushiis oo loogu talagalay in si toos loogula socdo, ha ahaato aaladdaasi mid madax bannaan ama mid ku xiran qalab kale, keenaysana macluumaad ama xog ku saabsan aagga uu joogo markabku, kalluunka uu qabtay iyo hawlaha kale ee loo baahdo, sahlayana markasta in la ogaado aqoonsiga markabka;

"***Qaran***", marka laga hadlayo xeer-xeeindaabka biyaha Soomaaliya waxaa ka mid ah muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo maraakiibta ka diiwaangashan Soomaaliya oo qaatay calanka Soomaaliya;

"***Korjooge***" waxaa loola jeedaa qof kasta oo loo xilsaaray in uu korjoogteeyo howlaha markabka kalluumeysi.

"***Hawlwadeen***" waxaa loola jeedaa qof kasta oo mas'uul ka ah howlo, haga ama maamula markab, wuxuuna noqon karaa milkiilaha, kiraystaha, kabtanka.

"**Dambiilayaal abaabulan**" waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Heshiiskii Qaramada Midoobay ee ka dhanka ahaa dembiyada abaabulan ee caalamiga ah ee soo baxay sanadkii 2003dii

"Qof" waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo caadi ah ama sharci ah, metela dowlad ama hay'ad gaar ah, sida; shirkad, iskaashato, urur ama ganacsi kale, koox ka kooban shaqsiyaad, bulsho, garsoor ama hay'ad dawladeed;

"**Jideeyey**" waxaa loola jeedaa sida sharcigu banneeyey;

"**Habeyn**" Marka kalluun laga hadlayo waxaa loola jeeda googoynta, kala-saaridda, nadiifinta, kala-soocidda, xirxiridda, baakadeynta, wasladeynta, qaboojinta, cusbaynta, qasacadaynta ama ilaalinta kalluunka;

"**Wargalin Dadweyne**" waxaa loola jeedaa gaarsiinta dadweynaha wargalinada ka soo baxa Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah.

"**Hawlaha la xiriira**", marka laga hadlayo kalluumaysiga, ama "hawlaha la xiriira kalluumaysiga" waxaa ka mid ah hawlgal kasta oo lagu taageerayo, ama loogu diyaar garoobayo, kalluumeysiga, oo ay ku jiraan soo dejinta,

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

baakadeynt, hagaajinta, markab saaridda ama daabulidda kalluunka aan hore dekedda looga soo dejin, iyo sidoo kale diyaarinta shaqaale, shidaal, qalab iyo agab kale oo badda ah;

"**Urur Goboleedka Maaraynta kalluumeysiga**" waxaa loola jeedaa Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee dowladaha gobolka, kaas oo awood u leh dejinta Hannaanka Maareeynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

"**Kalluunka aan guur guurin**" waxaa loola jeedaa sinjiyada/noocyada kalluunka ee negi ee ku nool badda, kuwaas oo gaaray heer la daban karo, ha ahaadeen kuwo aan ka dhaqaaqin korka ama hoosta gunta badda ama aan awoodin in ay guuraan marka laga reebo in ay joogto u tagaan badda gunteeda ama carrada hoose;

"**Iibin**" waxaa loola jeedaa kala gadasho sharci oo dhexmarta laba qofood iyo kabadan,

"**Markab yar oo Kalluumeysi**" waxaa loola jeedaaa markab yar oo kalluumeysi oo guud ahaan dhererkiisu u dhexeeyo 12 ilaa 24 mitir.

"**Markab Soomaaliyeed**" waxaa loola jeedaa markab ay leeyihiin shakhsiyaad Soomaaliyeed iyo markab ay leedahay dowladda Soomaaliya oo heysta diiwaangelin sharci ah iyada oo la raacayo sharciyada khuseeya Soomaaliya iyo mid kasta oo aan diiwaan gelin laga dhaafey.

"**Biyaha Soomaaliya**" waxaa loola jeedaa biyo kasta oo hoos yimaada xeer-xaymdaabka qaranka Soomaaliyeed ayna xaq u leedahay si madax-bannaan u maamusho.

" **Soomaaliya** " waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

"**Isticmaalka waara**" waxaa loola jeedaa u adeegsiga qaybaha noolaha kala duwan qaab iyo heer aan hoos u dhac horseedeyn muddada fog kala duwanaanshaha noolaha, si loo daboolo baahiyaha iyo himilooyinka jiilasha hadda jira iyo kuwa mustaqbalkaba;

"**Noocyada la beegsanayo**" waxaa loola jeedaa howlaha jilaabashada ee lagu bartilmaamaysanayo noocyo gaar ah oo kamid ah noole biyoodka.

"**Sahmin kalluun**" waxaa loola jeedaa jilaabasho cilmibaaris oo lagu ogaanayo noocyada kalluunka ee jiray ama kuwa cusub.

"**Dembiyada caalamiga ah**" waxaa loola jeedaa dembiyada laga galo in kabadan hal dal iyo kuwa ka dhaca dal laakiin laga qorsheeyo dal kale, dembiyada ay geystaan kooxo ka shaqeeya in ka badan hal dal iyo dembiyada laga galo hal dal oo saameyn ku yeesha dalal kale.

"**Rar-wareejin**" waxaa loola jeedaa markab ka wareejinta rar kalluun ama waxsoosaar kalluun oo lagu wareejiyo markab kale, ama lagu rogo xarun dhulka ku taal.

"**Isticmaalka dekedda**" waxaa loola jeedaa in wax laga dejiyo, wax lagu kala wareejiyo,lagu baakadeeyo, ama lagu qabto hawlaha lagu hagaajinayo kalluunka u socda meela kale, iyo hawlo kale oo ay ka mid yihiin, shidaal-qaadashada markabka, dib-u-hagaajinta, dayactirka iyo markab xiridda.

"**Markab**" waxaa loola jeedaa gaadiid badeed kasta oo loo isticmaalo howlaha kalluumeysiga sida; markab, doon, huuri.

"**Nidaamka La socodka maraakiibta**" waxaa loola jeedaa hab ama nidaam ku xiran dayax-gacmeed si loola socdo dhaqdhaqaaqa maraakiibta kalluumeysiga iyo howlaha ay hayaan.

"**Markab aan dalna ka diiwaan gashayneyn**" waxaa loola jeedaa markab loo adeegsado kalluumeysi ama howlo la xiriira, aanse sidan calan dowlad u gaar ah ama qaata laba calan iyo wax ka badan oo uu hadba kii anfacaya isticmaalo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

(2) Marka laga soo tago farqada (1aad) ee qodobkan, fasiraadda laxiriirta crey, Hannaanka maaraynta iyo ilaalinta caalamiga ah iyo cray lagu qeexay xeer ama qaamuuska qeexitaannada la adeegsan karo oo ah midka uu qaatay Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga; qeexitaanka noocaan ah waa la tixgelinayaa iyada oo la adeegsanayo fasiraadda lagu bixiyay sharcigan, gaar ahaan marka kan hore uu ka adkaan karo ama si fiican looga fahmi og yahay macnaha guud.

Qodobka 3

Ku Dhaqmid

1) Ilaa Sharci kale oo ka soo horjeeda laga helo; Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa;

a) Dhammaan dalka iyo dadka Soomaaliyeed meelaha ay ka jirto madaxbannaanida, xukun ama xuquuq madax-bannaan, iyada oo la tixgelinayo aagagga kalluumeysiga iyo maamulka dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka sida ku xusan qodobka 4-aad iyo kan 10aad;

b) Dhammaan kalluunka, kalluumeysiga iyo hawlaha la xiriira ama wax kasta oo hoos imaanaya sharcigan, oo ay ku jiraan noocyada kalluunka negi ee ku nool biyaha qolfoof qaaradeedka Soomaaliya.

c) Dhammaan dadka, maraakiibta, gawaarida, diyaaradaha, hawlaha lagu hagaajinayo kalluunka, hawlaha dhoofinta ama soo dejinta ama hawl kasta oo ku saabsan ama hoos imanaysa sharcigan ama xeerka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah;

d) Qof kasta iyo maraakiibta ku jirta ama ka baxsan meelaha ay ka jirto awoodda xeer xeyndaab badeedka qaranka:

(i) Iyada oo la raacayo heshiiska biyaha hoos yimaada Soomaaliya loona maamulo si waafaqsan sharciga caalamiga ah; ama

(ii) iyada oo la raacayo Sharcigan ama Hanaanka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah, ama uu oggol yahay sharciga caalamiga ah ama heshiis kasta oo caalami ah; iyo

e) Dhammaan maraakiibta Soomaaliyeed iyo dadka saaran oo dhan, ee lashaqeeya ama la macaamilaya ama xiriirka la leh, inta lagu guda jiro ama laga baxsan yahay meelaha ay ka jirto awoodda xeer xeyndaabka biyaha qaranka illaa iyo inta aanay khilaafsaneyn awoodda sharci ahaaneed ee dal kale.

2) Markabka waxaa loo arkayaa in aanu ahayn markab Soomaaliyeed haddii laga diiwaangaliyo dal aan Soomaaliya aheyn halkii laga diiwaangelin lahaa ama lagu dari lahaa liiska diiwaan galinta Maraakiibta Soomaaliya, marka laga reebo in uu yahay markab kireysan oo ku shaqeynaya nidaam diiwaangelineed oo barbar socoda si waafaqsan heshiiska kireynta iyo shuruucda ku habboon, iyo xeerar waddamada ku jira heshiisyada caalamiga ah.

Qodobka 4

Aagagga Kalluumeysi

1. Aagagga dhul-badeedka ayaa la jaangooyey iyadoo laga cabirey dhanka xeebta ilaa biyaha sare, kuwaas oo kala ah;

a) Aagga Xaddidan ee Kalluumeysiga wuxuu gaarayaa 12 mayl badeed, waxana uu u xaddidan yahay kalluumeysiga yaryar iyo doomaha dhererkoodu ka weynayn 12 mitir ee ay leeyihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed, Maraakiibta waaweyn iyo kuwa yaryar waa ka mamnuuc inay ka kalluumeystaan Aaggan. Maamulka ay khusayso ee xubinta ka ah Dowladda Federaalka ayaa ka mas'uul ah maamulka iyo diiwaan gelinta kalluumeysata yaryar ee Aaggan;

b) Aagga dhawran ee kalluumeysi waa kan xiga aagga xadidan wuxuuna gaarayaa 24 mayl badeed, Aagan waxa loo dhawray howlaha la xiriira kalluumeysiga iyo Doonyaha kalluumeysi ee aan ka wayneyn 24 mitir ayna leeyihiin muwaadiniin Soomaaliyeed, waxaana diinwaangalinaya Dowladaha xubnaha ka ah DfS, iyagoo latashanaya Wasaaradda Kalluumeysiga & Dhaqaalaha Buluugga ah DFS.

c) Aag dhaqaaleedka Gaarka ah ee Kalluumeysiga, kaas oo ah Aagga u dhexeeya 24 illaa 200 mayl-badeed, si waafaqsan Sharcigan aaggan waxaa maamulaya Wasaaradda Kalluumeysiga & dhaqaalaha buluugga ah ee XFS.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2. Wasiirka ayaa leh masuuliyadda iyo awoodda Aaga Dhowrau iyo Aagga dhaqaalaha gaarka ah ee kalluumeysi isagoo la shaqaynaya dawladaha xubnaha ka dawlada federaalka ah si waafaqsan sharcigan iyo meelmarintiisa.

3. Kalluumeysiga iyo howlaha la xiriiraba ee aag kasta, waa in loo maamulaa sida sharcigan uu farayo, kaas oo siinaya masuuliyada koowaad Wasaaradda si waafaqsan dastuurka, waajibaad kasta ee heer gobol ama mid caalami ah iyo heshiis kasta oo ay wada galaan DFS iyo **dowladaha** xubnaha ka ah DFS iyo danceyayaasha.

UJEEDOOYINKA iyo MABAADI'DA SHARCIGA

Qodobka *5*

Ujeeddo

Ujeeddada sharcigan waa in la xaqiijiyo maaraynta, horumarinta kheyraadka kalluumeysiga, kalluun beerista iyo wixii la jinsi ah, iyada oo sidoo kalena in la ilaalinayo jiritaanka Dhaqaalaha Buluugga ah ee Soomaaliya, noola biyoodka, deegaanka iyo nidaamyada wada noolaanshaha si ay uga faa'iideystaan dadka Soomaaliyeed.

Qodobka 6

Mabaadi'ida Guud

Dhammaan howlaha, waajibaadyada iyo mas'uuliyadaha ku xusan Xeerkan waxaa loo fulin doonaa hab waafaqsan mabaadi'da soo socota:

a) Dhammaan kalluumeysiga iyo beerista kalluunka, iyo sidoo kale deegaanka ay ku nool yihiin, waa hanti dabiici ah oo dhaxal u ah dhammaan ummadda Soomaliyeed oo ay waajib ku tahay ka qeybgalka ilaalinta jiritaankooda, maaraynta iyo horumarinta kheyraadkan dabiiciga ah iyo deegaankooda; si waafaqsan sharcigaan, siyaasadda qaranka, qorshayaasha iyo ujeedooyinka horumarka;

b) Hanaanka ilaalinta iyo maaraynta waa in uu ku saleysnaadaan aqoon iyo farsamo tan ugu wanaagsan ee la heli karo si loo joogteeyo ama loo ilaaliyo keydka nooleyaasha, si loo awoodo in la gaaro wax soo saar heer sare ah oo waara, kaas oo u qalma arrimaha dhaqaalaha iyo deegaanka;

c) Hanaanka ilaalinta iyo maareynta wuxuu dabaqayaa waajibaadka Soomaaliya ee heshiisyada caalamiga ah sida ugu habboon iyo heshiisyada Dowliga ah.

d) Waa in si taxaddar leh loo dabbakho habka maareynta iyo horumarinta kalluumeysiga;

e) Waa in habka wada noolaanshaha loo adeegsado maaraynta iyo horumarinta kalluumeysiga iyo beerista kalluunka si kor loogu qaado bedqabka guud ee deegaan biyoodka, waana in lagu talagalaa isbeddelka cimilada iyo baaqyada caalamiga ah ee la xiriira horumarka dunidda;

f) Hawlaha iyo Xeerarka ku xusan sharcigan waa in ay ilaaliyaan isla markaana daryeelaan kala duwanaanshaha noolaha, kuwaas oo ay ka mid yihiin noocyada kalluun ee khatarta ku sugan iyo deegaannada xasaasiga ah;

g) Xog sax ah oo dhameystiran iyo macluumaadka ku saabsan hawlaha iyo khayraadka ku xusan Sharcigan waa in la raadiyo, la uruuriyo , iyo waqtiga ugu habboona loola wadaago dhinacyada ay khuseeyso.

h) Hanaanka Ilaalinta iyo maaraynta waa in si wax ku ool ah loo meelmariyaa loona dhaqangeliyaa iyada oo lala soconayo, lana kormeerayo lana dabagalayo;

i) Danaha kalluumeysatada yaryar waa in ahmiyad la siiyaa, iyadoo lagala shaqaynayo lagana qaybgalinayo maaraynta kalluumaysigooda;

j) waa in sare loo qaadaa fahamka ka qaybgalinta danceyayaasha ilaalinta, maareynta, horumarinta waarta ee kheyraadka kalluumeysiga.

k) Sida ku xusan sharcigan, wadashaqeyn wax ku ool ah ayaa lala yeelan doonaa dawladaha iyo urur goboleedyada.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

CUTUBKA 2-AAD
MASUUULIYADAHA HAY'ADAHA MAAMULKA KALLUUMAYSIGA
Qodobka 7
Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah

1) Wasaaradda ayaa yeelanaysa mas'uuliyadda koowaad ee dhaqangelinta iyo meelmarinta qodobbada ku xusan sharcigan;

2) Hawlaha iyo waajibaadka Wasaaraddu waa:

a) In ay maamusho howlaha laxiriira kalluumeysiga iyo beerista kalluunka iyo arrimaha kale iyadoo la raacayo sharigan, lana dhiirri gelinayo ilaalinta, maareynta, horumarinta iyo isticmaalka waara ee kheyraadka kalluumeysiga, lana tixgelinayo xuquuqda iyo waajibaadka dalka si waafaqsan sharciyada iyo heshiisyada caalamiga ah;

b) In ay daryeesho oo maamusho kalluumaysiga iyo bey'ada kalluunka, sida tayada biyaha iyo kala duwanaanshaha noolaha, ee deegaanka ku wada nool, iyada oo lala tashanayo hay'adaha ay khuseyso, Dowladda Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka;

c) In ay **Dawladaha xubnaha ka ah DFS** sida ugu habboon ugala-tashato dejinta iyo fulinta qorshayaasha, siyaasadaha, xeeladaha iyo farsamooyinka la xiriira horumarinta iyo maaraynta kalluumeysiga iyo wixii kale ee sharcigani dhigayo, kor u qaadista iswaafajinta ilaa xad intii suurto galka ah guud ahaan Dalka.

d) In ay ku metesho Dowladda wixii heshiis ama qorshayaal caalami ah ee la xiriira Kalluumeysiga iyo hawlahiisa, beerista kalluunka iyo wixii kale ee ku qoran sharcigan, taas oo Soomaaliya ay qeyb ka tahay ama ka mid noqon doonto;

e) In ay heshiis la gasho isla markaana isku dubariddo howlaha kala dhaxeeya **dowladaha xubnaha ka ah DFS**, hay'adaha kale ee dowladda, urur goboleedyada iyo hay'adaha kale ee shaqada kala dhaxayso.

f) In ay go'aan ka gaarto bixinta ruqsadaha, ogolaanshaha ama fasaxyada kalluumeysiga islamarkaana dhaqan-galiso habraacyada ruqsad bixinta si waafaqsan sharcigan.

g) In ay ururiso ayna falanqeyso xogta iyo macluumaadka la xiriira hawl kasta oo ku xusan Sharcigan, si habboona u ilaaliso macluumaadka diiwaanka ku jira, xaqiijisana in macluumaadka la baahiyey si fududna loo heli karo;

h) In ay kormeer, xakameyn, dabagal iyo dhaqan gelinba ku samayso sharcigan, iyada oo kaashanaysa hay'adaha dawladda, **Dowladaha xubnaha ka ah DFS**, iyo ururada kale ee ay khusayso,

i) In ay dhiirrigeliso isla-maaraynta dhammaan kaydka iyo kheyraadka ku jira badda, iyadoo la horumarinayo iskaashatooyinka,ururada kalluumeysiga iyo guddiyada maaraynta **dowladaha xubnaha ka ah DFS**.

j) In ay dhiirrigeliso maalgashiga si loo horumariyo loogana faa'iideeysto kalluumeysiga;

k) In ay dhiirrigeliso hababka kalluumeysiga casriga ah, loogana faa'iideeyo bulshooyinka xeebaha ku nool;

l) In la raaco sharci kasta ama xeer kasta oo laga soo saaray Soomaaliya, kaas oo xakameynaya oo ilaalinaya bedqabka kalluunka iyo wax soosaarka kalluunka ilaa iyo heerarka kala duwan ee nidaamyada kalluunku marayo;

m) In ay diyaariso Qorshe Sanadeed Shaqo iyo Warbixin Sanadeedka Wasaaradda si uu Wasiirku u ansixiyo dadweynahana u gaarsiiyo;

n) In ay hagto hawlaha la xiriira soo dejinta, dhoofinta iyo qiimeynta kalluunka hadba sida ay lagama maarmaan u tahay taageeridda maaraynta kalluumeysiga;

o) In ay oggolaato, qorshayso ama fududeyso cilmibaaris ku saabsan arrin kasta oo sharcigan waafaqsan, taas oo ay ku jirto iskaashi cilmibaariseed oo heer gobol ah;

p) In ay Dhiirigeliso tababarro ku saabsan kalluumeysiga iyo beerista kalluunka;

q) In ay hoggaamiso kana qaybqaadato qorshaynta iyo fulinta mashaariicda, barnaamijyada ama howlaha kale ee laxiriira qodobbada ku xusan sharcigan;

r) In ay dejiso habraac kasta oo lagama maarmaan u ah dhaqangelinta Sharcigan; iyo

s) In ay fuliso hawlo iyo waajibaadyo kale, wixii hadba loo baahdo si loo fuliyo ujeeddooyinka, mabaadi'da iyo qodobbada Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

3) Wasaaraddu waxay wax ka bedel ku samayn kartaa qaar ka mid ah hawlaheeda iyo waajibaadkeeda iyadoo la tashanaysa **Dowladaha xubnaha ka ah DFS** gaar ahaan horumarinta siyaasadaha iyo farsamooyinka lagu horumarinayo kalluumeysiga.

4) Dhammaan Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee Dowladdu waa inay si buuxda ula shaqeeyaan wasaaradda si loo xaqiijiyo hadafka iyo waajibaadka wasaaradda ee horumarinta kalluumeysiga.

5) Wasaaraddu waxay dhisi doontaa Hay'adda Kalluumaysiga Qaranka iyadoo la tashanaysa wasaaradaha kalluumeysiga ee Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

Qodobka 8
Howlaha iyo waajibaadka Wasiirka

1) Wasiirka ayaa fulinaya hawlaha, awoodaha iyo waajibaadka la siiyay sida ku xusan Xeerkan, gaar ahaanna waxa uu:

a. Jiheyn doonaa, xakamayn doonaa oo hagi doonaa siyaasadda iyo arrimaha ku xusan xeerkan, oo ay ka mid yihiin ansixinta, ka tala bixinta, wax ka beddelka ama ka noqoshada:

i. Heshiisyada caalamiga ah, nidaamyada, siyaasadaha, qorshayaasha, istaraatiijiyadaha, miisaaniyadaha, kharashaadka iyo warbixinnada ku xusan Sharcigan ama sharciyada la xiriira ee Dalka, si ay u saxiixaan ama u meelmariyaan Golaha Wasiirada ama Baarlamaanka;

ii. Wixii heshiis ah, nidaamyo ah ama qorshe ah ee hoos imaanaya sharcigan, kuwaas oo u dhexeeysa ama ay galeen Dawladda Federaalka ah iyo dhammaan Dawlad-goboleedyada, ayna ka mid yihiin qoondaynta,maaraynta, horumarinta, maalgashiga iyo maamulka la xiriira kalluumeysiga iyo kalluun beerista si waafaqsan Sharcigan;

iii. Heshiis kasta ama nidaam kasta oo khuseeya kalluumaysatada shisheeye ee ka kalluumaysata kheyraadka biyaha Soomaaliya; iyo

iv. Heshiis kasta ama nidaam kasta oo ku xusan sharcigan oo lala galo hay'ad kale oo Dawladeed;

b. Ansixin doonaa shuruucda wuxuuna taageeri doonaa iswaafajinta maamullada kalluumaysiga iyo kalluun beerista, iyo heshiisyada ay galayaan Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, oo ay ka mid yihiin;

i. Masuuliyadaha hay'adaha;
ii. Iswaafajinta sharciyada;
iii. Horumarinta Nidaamyada isla-maarcynta;
iv. Kormeerka, la socoshada iyo dabagalka;
v. Wadaagista macluumaadka;
vi. Cilmibaarista;
vii. Hagidda maalgashiga iyo horumarka; iyo
viii. Heshiiska qaybsiga dakhliga kalluumeysiga iyo xaqiijinta dakhligaas qayb kamid ah waa in lagu horumariyo arimaha kalluumeysiga.

c. Bixin doonaa ruqsado ama oggolaansho kale si waafaqsan xeerkan;

d. La gelayaa heshiis dakhli wadaag dawladaha xubnaha ka Dawlada Federaalka;

e. La socon doonaa horumarada caalamiga ah ee arrimaha kalluumeysiga,wuxuuna xaqiijin;

f. doonaa gudashada waajibaadka Soomaaliya ka saaran heshiisyada caalamiga ah;

g. Soo saari doonaa wareegtooyinka, xeerarka iyo ogeysiisyada kale ee dadweynaha ee lagama maarmaanka u ah hirgelinta Xeerkan iyo maaraynta kalluumaysiga iyo kalluun beerista;

h. Ansixin doonaa xeer-hoosaadyada si waafaqsan Qodobka 158aad ee sharcigan.

2) Wasiirku wuxuu magacaabi karaa guddiyo madaama ay lagama maarmaan noqon karto inay ka soo talo bixiyaan dhinac kasta oo ka mid ah sharcigan, isagoo tixgelinaya talooyinka iyo soojeedinnada guddiyadaas;

3) Wasiirku wuxuu qoraal ahaan ugu idman karaa agaasimaha guud howlo gaar ah, markii ay lagama maarmaan noqoto arrimaha muhiimadda gaarka ah leh wuxuu la tashanayaa wasiirka.

Qodobka 9
Howlaha iyo waajibaadka Agaasimaha Guud

1) Agaasimaha Guud waxa uu mas'uul ka yahay maamulidda hawl-maalmeedka Wasaaradda iyada oo Wasiirkuna ku kormeerayo.

2) Iyada oo aan wax loo dhimayn guud ahaan arrimaha aan soo xusnay, Agaasimaha Guud waxa uu:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

a) Mas'uul ka noqon doonaa fulinta howlaha, maareynta arrimaha iyo socodsiinta awoodaha, shaqooyinka iyo waajibaadka Wasaaradda;

b) Dhiirrigelin doonaa fasiridda, dhaqangalinta iyo hirgelinta Xeerkan, si wax ku ool ah, isaga oo la-tashanaya oo kaashanaya Dowlad-goboleedyada;

c) Hubin doonaa hab-sami usocodka maamulka Wasaaradda, oo ay ka mid tahay diyaarinta iyo horumarinta miisaaniyad-sanadeedka, qorshayaasha shaqada, warbixinnada iyo horumarinta istaraatiijiyadaha, iyo sidoo kale shuruucda, wareegtooyinka iyo faafinnada rasmiga ah ee dowladda sida ku xusan Sharcigan;

d) Ka shaqaynta horumarinta, suuqgeynta iyo dadaallada maalgashiga kalluumeysiga iyo kalluun beerista;

e) Raaci doonaa awaamiirta Wasiirka, isaga oo wakiil uga ah Wasaaradda wada-xajoodyada heshiisyada,kuna matalaya arrimaha ku xusan Xeerkan oo ay mid yihiin maaraynta, ilaalinta, horumarinta, maaafacaadka kalluumeysiga iyo kalluun beerista;

f) Qaban doona waqti iyo shaqo kasta oo uu Wasiirku uga baahdo si waafaqsan Xeerkan.

3) Agaasimaha Guud wuxuu qoraal ahaan ugu idman karaa sarkaal Wasaaradda ka tirsan howlihiisa gaarka ah iyo waajibaadka ku xusan Xeerkan.

Qodobka 10
Awoodaha, mas'uuliyadaha iyo waajibaadka Dawlad-goboleedyada

1. Dawlad-goboleed kasta wuxuu lahaan doonaa Awoodo, mas'uuliyado iyo waajibaadyo la xiriira kalluumeysiga iyo kalluun beerista deegaanadooda sida uu qabo sharcigan, waxayna heshiisyo kale la geli karaan Dowladda Federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah DFS, si waafaqsan siyasadaha Dowladda federaalka iyo qaababka horumarineed, waxa ayna leeyihiin:

a) Mas'uuliyadda ilaalinta Aagga Kalluumeysiga u Xaddidan oo gaaraya ilaa (0-12mayl-badeed) iyo Aagga Kalluumeysiga u dhawran oo gaaraya ilaa (12-24 mayl-badeed) sida lagu qeexay qodobk 4-aad;

b) Mas'uuliyadda maareynta iyo ruqsad siinta kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira Aagga u xaddidan Kalluumeysiga, iyada oo ruqsadaha ama oggolaansho la siinayo keliya muwaadiniinta Soomaaliyeed ama maraakiibta aan ka weynayn 24 mitir ee ka shaqeysa kalluumeysiga ama howlaha la xiriira oo ay leeyihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ka hawl gala aagga Kalluumeysiga u dhawran;

c) Mas'uuliyadda maareynta iyo ruqsad siinta kalluumeysiga iyo kalluun beerista biyaha-macaan sida webiyada iyo kalluunka lagu beero aagga u Xaddidan Kalluumeysiga

d) Socodsiinta mas'uuliyadahooda iyo waajibaadkooda iyaga oo kaashanaya lana tashanaya Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada kale wixii ay isaga baahdaan oo ku heshiiyaan si waafaqsan sharcigan, iyada oo la is-waafajinayo maaraynta iyo horumarinta kalluumeysiga iyo kalluun beerista, la iskana kaashanayo:

i. Masuuliyadaha hay'adaha;
ii. Iswaafajinta sharciyada;
iii. Horumarinta Nidaamyada isla-maareynta;
iv. Kormeerka, la socodka iyo dabagalka;
v. Xog ururinta iyo wadaagista macluumaadka;
vi. Cilmibaarista;
vii. hagidda maalgashiga iyo horumarka;

Qodobka 11
Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kallumaysiga

1- Waxa la dhisayaa Gole maamul iyo horumarin Kalluumeysi si ay go'aan ugu gaaraan arrimaha la xiriira;

a) Maamulidda, Horumarinta iyo isticmaalka waara ee wax soo saarka kalluumaysiga iyo deegaankiisa la wadaago

b) Isku xirka, ka wadatashiga waajibaadka lagu sheegay sharcigan khaastana arimaha la xiriira wadashaqeyn, Maamul, Macluumaad, Cilmi-baaris iyo ilaalinta deegaanka Kalluumeysiga iyo noolaha biyoodka

c) Hirgalinta hab-raacyo tilmaamaya wadashaqeynta isla markaana xoojinaya xiriirka, si loo hirgaliyo talooyinka golaha ee ku saabsan maamulidda kheyraadka la wadaago iyo masuuliyadaha.

d) Horumarinta iyo hirgalinta shirciyo is-waafaqsan.

e) Horumarinta iyo hirgalinta hal-beegyo iyo shuruudo la xiriira maalgashiga arimaha kalluumeysiga iyo noole biyoodka oo ay ka mid yihiin maalgashiga shisheeyaha

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

f) Qaybsiga wax-soo saarka kheyraadka dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah

g) Dhaqangalinta siyaasad kasta oo uu wasiirka go'aamiyey isagoo kala tashaday maamul goboleedyada xubnaha ka ah DFS.

2- Xubnaha Golahu waxay ka koobnaanayaan Wasiirka oo ah shir gudoonka iyo wasiirada ugu magacaaban kalluumeysiga maamul goboleedyada.

3- Goluhu wuxuu dalban karaa xog cilmi-baaris iyo warbixinada si go'aan loogu gaaro.

4- Goluhu wuxuu kulmayaa sanadkii afar jeer ugu yaraan ama marka uu u yeero shir gudoonka golaha ama ay codsadaan ugu yaraan laba xubnood.

5- Shirarka golaha waxaa kasoo qayb-gali kara masuuliyiinta sarsare ee ka tirsan wasaaradaha heer federaalka iyo maamul goboleed ee kalluumeysiga iyo korjoogto kale marka lagu martiqaado shirka inay ka soo qaybgalaan.

6- Go'aanada waxaa loo qaadanayaa wadar ogol.

7- Xubin kasta oo golaha ka tirsan ah waxay soo magacaabaysaa qof xiriiriye ah oo u matasha qaban qaabada shirarka iyo maamulka golaha.

8- Golaha wuxuu yeelanayaa xeer hoosaad ay isku dhaqaan

9- Hay'adda Kalluumeysiga Qaran ayaa sharci lagu dhisayaa si ay u qabato shaqada loo idmay sida uu sheegayo sharcigan qodobkiisa 7aad taas oo wax ka maamulaysa kheyraadka kalluunka dalka iyo go'aanada golaha horumarinta uu gaaro.

Qodobka 12
Dano is diidan:

1) Marka Qof xil haya uu ku fulinayo mas'uuliyadaha, hawlaha iyo waajibaadka ku xusan xeerkan qof isaga ama iyada iyo xubin kasta oo isaga xigto ama qaraabo la ah, Qofkaasu waxa uu yeelan karaa dano dhaqaale ama mid qaraabannimo,waa inuu fuliyaa shaqooyinka ama waajibaadka soo socda:

a) In uu si dhakhso leh ugu soo bandhigo qoraal isaga oo cadaynaya danaha iska hor imanaya;sida ku qeexan faqrada labaad ee hoose (2); iyo

b) In aanu qaban wax howlo ah sida uu qabo sharcigan isaga oo ugu danaynaya.

2) Qof kasta oo ku sifooba arrimaha ku xusan faqrada koowaad (1) ee qodobkan waxaa loo gudbinayaa:

a) Agaasimaha Guud, waana in uu wasiirka u caddeeyaa danaha kala dhaxeeya isaga ama iyada; ama

b) qof kasta oo kale, waana in uu Agaasimaha Guud u caddeeyaa danaha kala dhaxeya isaga ama iyada.

3) Marka la shaaciyo sida ku xusan farqada (2aad), Wasiirka ama Agaasimaha, midkii ay noqotaba; wuxuu magacaabayaa sarkaal kale si uu u qabto shaqooyinka la xiriira arrintaas.

4) Ujeeddooyinka qodobkan awgii, qofku wuxuu dan ka yeelan karaa haddii uu ama ay;

a) ka soo galayso dan dhaqaale ama mid maaddi ah;

b) Is-qabaan, wadda nool yihiin, carruur ama waalid isu yihiin qofka, kaas oo dano dhaqaale arrintu ugu jirto.

c) Dano dhaqaale ka leeyahay qofka ama kuwa arrintu la xiriirto;

d) Dano qaraabanimo ka leeyahay qofka ama kuwa arrintu la xiriirto;

e) Yahay ama yihiin, agaasime, sarkaal, xubin guddi, ama wakiil shirko la ah qofka, kaas oo dano dhaqaale arrintu ugu jirto.

f) Dan ka helayo ama ka helayso sharciyadda la bixiyey awgeed;

5) Qofkii jebiya qodobkan wuxuu galayaa dambi wuxuuna muteysan doonaa xukun Ganaax ah oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee ku qoran Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale ee ku xusan sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

CUTUBKA 3-AAD
ILAALINTA, MAAREYNTA, HORUMARINTA IYO ISTICMAALKA WAARA
QEYBTA 1AAD
QODOBO GUUD
Qodobka 13
Hannaanka Ilaalinta Iyo Maaraynta

1) Sida ku xusan Sharcigan,dhaqan gelinta waajibaadyada kala duwan ee Hannaanka maaraynta iyo ilaalinta kalluumaysiga; wasaaradda iyo Dowlad-goboleedyada waa inay horumariyaan, kormeeraan, hirgeliyaan oo ay fuliyaan, hannaanka maareynta iyo ilaalinta lagama maarmaanka u ah hubinta isticmaalka Kheyraadka kalluumeysiga muddada dheer, sida shuruucda ku habboon kalluumeysiga, kalluun beerista iyo howlaha la xiriira, iyo wixii hawlo kale ah oo hoos yimaada sharcigan.

2) Marka laga hadlayo hannaanka maaraynta iyo ilaalinta kalluumaysiga, iyadoo la tixgelinayo waajibaadyada ay kala leeyihiin, Wasaaradda iyo Dawlad-goboleedyadu sida ugu habboon waa inay la yimaadaan hanaanka maareynta, horumarinta kalluumaysiga iyo kalluun beerista, ayna hirgelinayaan heshiisyada caalamiga ah iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah, waxaana ka mid noqon kara;

a) In sameeyaan qoondayn, aag, qalab, xaddidaad hawleed, xaddidaad xilliyeed, baaxadda kalluumeysi, saami-goyn, mamnuucid, xuquuqo ka qayb qaadasho iyo warbixinno

b) In ay amraan ama mamnuucaan, adeegyada kala ah; soo dejinta, daabulida, rar-kala gudbinta, qaadashada, ganacsiga iyo kalluun haysashada iyo diyaarinta qaab dhismeedyo lagu maamulo goobaha wax laga soo dejiyo.

c) In ay baaraan ayna hubiyaan tayada kalluunka iyo waxyaalaha ka yimaada;

d) In ay nidaamiyaan hawl kasta oo hoos imanaysa xeerkan, taas oo saamayn taban ku yeelan karta kheyraadka noole, ma-noole ama deegaan biyood;

e) In ay diyaariyaan maareynta howlaha kalluun beerista si loo hubiyo tayada kalluunka, oo ay ku jiraan arrimaha la xiriira qalabka, sinjiyada kalluunka, cudurrada iyo deegaanka;

f) Sida ugu habboon looga shaqeeyo soo-kabashada keydka kalluunka;

g) Dhiirigelin dheeraad ah oo loogu talagalay horumarinta ganacsiga waara ee warshadaha kalluumeysiga si buuxdana loogu hoggaansamo; iyo

h) In ay diyaariyaan hawl kasta oo hoos imanaysa sharcigan oo la xiriirta ilaalinta iyo maaraynta kheyraadka kalluumeysiga.

3) Marka laga reebo in loola jeedo macne ka duwan midka ku xusan Sharcigan, Hannaanka ilaalinta iyo maarayntu wuxuu yeelan doonaa awood sharci iyo dhaqangal iyada oo loo marayo waajibaadka Wasaaradda ee kala ah:

a) Ansixinta xeerka wasiirka, isaga oo tixgelinaya soo jeedinta Wasaaradda, waxaana lagu baahinayaa faafinnada rasmiga ah ee dowladda ee uu wasiirku tilmaami doono waxaana lagu daabacayaa barta rasmiga ah ee Wasaaradda;

b) Shuruudaha ruqsadaha, oggolaanshaha ama fasaxyada kale ee lagu bixiyo si waafaqsan sharcigan;

c) Habraacyada lagu xusay qodobka 15aad ee khuseeya Hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah; ama

d) Ansixinta Qorshayaasha Maareynta Kalluumeysiga sida ku cad qodobka 17aad.

4) Iyadoo aan wax loo dhimayn awoodda iyo xuquuqda madaxbannaanida Soomaaliya ee kheyraadka kalluumeysiga iyo xukunkeedaba, si ku habboon hannaanka maareynta iyo ilaalinta ayaa loo fulin doonaa hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah iyo qorshaha waxqabadka cilmiyaysan, kaas oo uu ansixiyey Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee arrimahan ku shaqada leh; iyada oo la eegayo:

a) Markab kasta ama qof kasta oo jooga aagaga hoos yimaada Soomaaliya; iyo

b) Muwaadiniinta Soomaaliyeed oo ay ku jiraan shakhsiyaadka iyo maraakiibta joogta goobaha uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysig;

5) Hannaanka Maaraynta iyo ilaalinta ayaa la sameyn doonaa iyada oo la tixgelinayo ujeeddada iyo mabaadi'da Sharcigan, la-tashiyana lala yeelanayo daneeyayaasha ilaa xad intii suurtagal ah.

6) Qofkii ka horyimaada hannaanka maareynta iyo ilaalinta ee sharcigan ku xusan, kaas oo u dhaqan galay si waafaqsan farqada (3) (a), (b), (c) ama (d) waxa uu galay dembi, haddii aan si kale loo saamixinna waxaa

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

lagu xukumayaa ganaaxa lacageed ee ku xusan jadwalka koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan.

Qodobka 14
Abuurista Urur Iskaashi Maamul

1) Ururada Iskaashatada Kalluumaysiga ayaa lagu dhisayaa heshiis qoraal ah oo waafaqsan sharcigan, ujeedkiisuna yahay gudashada xuquuq iyo waajibaad ka jira goobo cayiman; si loo ilaaliyo, maareeyo, nidaam waarana loogu horumariyo kalluumyesatada yaryar, si waafaqsan qorshayaasha iyo habraacyada Wada-maareynta ay ku heshiiyaan Wasaaradda iyo maamul goboleedyadu.

2) Aagga loo cayimayo wada-maareynta kalluumeysiga, waa in uu u dhaw yahay degmo (deegaanada xeebaha) ama bulsho kalluumeysato ah oo si caadi u isticmaasho; ayadoo la tixgelinayo aagagga kalluumaysiga ee sharcigan, waa in aan laga gudbin Aagga Xaddidan.

3) Ururka wada-maareynta kalluumeysiga waxa ka mid noqonaya wakiillo ka kala socda Wasaaradaha Kalluumeysiga ee dowlad goboleedka, Degmada, xubnaha iskaashatooyinka, ganacsatada kalluunka iyo daneeyayaasha kale ee kalluumeysiga.

4) Heshiiska lagu aasaasayo ururka wada-maareynta kalluumaysiga waa in la wargaliyo cidda ay khuseyso, waana in loo diyaariya arrimahan;

a) Hawlaha iyo ujeeddooyinka;
b) Aaggiisa maareynta kalluumeysiga;
c) Kala mudnaysiinta maareynta kalluumeysiga, sida sinjiyada kalluunka;
d) Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha, iyo
e) Wixii kale oo lagama maarmaan ah oo waafaqsan Sharcigan, iyo habraacyada ay ku heshiiyaan Wasaaaradda iyo dawlad goboleedyadu.

5) Heshiiska nidaamka wada-maareyntu:

a) Wuxuu dhaqan galayaa marka Wasiirka kalluumeysiga dowlad-goboleedka ay khuseyso wareegto ku ansixiyo; iyo
b) Lana ogeysiiyo Wasaaradda Kalluumeysiga DFS.

6) Aagga loo cayimay wada-maaraynta kalluumaysiga waa laga noqon karaa:

a) Haddii Qeexidda iyo xudduudda labada dhinac kala qeybisa ay is beddesho codsi ka yimid bulshada deegaanka awgeed; iyo
b) Haddii aanay waafaqsaneyn shuruudaha heshiiska la samaynayo, ama haddii danta ilaalinta iyo maareynta kalluumaysiga ay ku jirto in la joojiyo cayimidda.

Baahinta ka noqoshada waxa leh Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga dowlad-goboleedka ay khuseyso iyadoo la ogeysiinayo Wasaaradda Kalluumeysiga DFS.

7) Wasaaradda iyo Wasaaradaha Kalluumeysiga Dawlad-goboleedyada ilaa xad intii suurtagal ah, mid kasta waa inuu gacan ka geystaa:

a) Hagidda ilaalinta iyo maareynta kalluumeysiga, iyo diyaarinta qorshayaasha maareynta kalluumeysiga
b) taageero xagga farsamada ah, oo ay ku jirto caawimaadda diiwaangelinta iyo keydinta xogta;
c) Gacansiinta iyo hagitaanka xog ururinta, iyada oo la adeegsanayo macluumaadka ay isku raaceen xubnaha Ururka iyo Wasaaraddu;
d) Waxyaabaha xagga sharciga kalluumaysiga la xiriira iyo wax ka beddelkiisa; iyo
e) tababaro iyo tayeyn ku aaddan maaraynta kalluumeysiga.

8) Wasiirka Dowlad-goboleedka ay khuseyso wuxuu ansixinayaa ergada iyo macluumaadka soo socda iyo go'aan-qaadashada mas'uuliyiinta iyo waajibaadka ururka ama nidaam ku dhisan qodobkan, waxa uuna uga baahan karaa in la isku dubbarido, ama oggolaansho uga helo arrimaha ay ka midka yihiin:

a) Qaadashada hannaanka maareynta kalluumaysiga ee la tilmaamay;
b) Magacaabida dadkii ay kaashan lahaayeen kormeerayaashaa kalluumeysiga ama booliska si kor loogu qaado fulinta hannaanka maaraynta, oo ansixintu ay qeyb ka tahay;
c) Kormeerida howlaha kalluumeysiga; iyo
d) Sida awoodaha kale, waxa uu oggolaanayaa wixii waafaqsan ujeeddada iyo mabaadi'da Xeerkan iyo sharciyada kale ee Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

9) Qofkii Jebiya xeerarka maaraynta ee qorshaha Horumarinta ama soo gala aagga wada-maareynta kana hor yimaada qorshaha ama heshiiska ama nidaamyada ururka u samaysan, qofkaasi:

a) Marka laga reebo dadka ku hawlan kalluumeysiga yaryar wuxuu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay ganaax iyo / ama ciqaabta u soo baxda, sida ku xusan heshiiska ama nidaamyada ururka;

b) Dadka ku hawlan Kalluunka badwaynta, Kalluumeysiga heerka dhexe iyo kalluumeysiga yaryar, ama hawlaha la xiriira waxaa lagu ciqaabi karaa inaanu u hoggaansamin sharcigan, hase yeesheein laga qaado qaar ka mid ah lacagihii lagu ganaaxay, ama si kale looga qaanbaxo dembiyada noocan ah waa go'aamada maamulka, kaas oo lagu sheegi karo ama ku jiri kara heshiiska ama nidaamyada ururka;Waxaana la siinayaa ururka ay khusayso, waxaa intaa dheer, magdhow laga bixinayo wixii khasaaro maaliyadeed ah ee ka dhasha sharci jebinta noocaan ah.

10) Ganaax kasta ama ganaaxyo kale oo lacageed oo uu soo helo ururku ama nidaamku waxa uu noqon doonaa mid la ururiyey, la maamulay, lagu kala wareegay laguna xisaabtamey si waafaqsan heshiiskiisa.

Qodobka 15

Hirgelinta Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga ah

1) Shuruudaha ku saabsan maaraynta iyo Ilaalinta caalamiga ah ee la adeegsado, marka loo eego:

a) Milkiile kasta, howlwadeen kasta iyo / ama kabtanka markab Soomaaliyeed oo haysta ruqsad ay soo saartay Wasaaraddu laguna qoray diiwaanka Maraakiibta Idman ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga loona idmay inuu ka kalluumeysto noocyada kalluunka iyo meelaha ruqsadda loo siiyey in uu ka hawlgalo;

b) Milkiile kasta, howlwadeen kasta iyo / ama kabtan, waa in uu raacaa sharcigan iyo xeerka maareynta iyo ilaalinta caalamigah; iyo / ama

c) Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed, Saamayn buuxda ayuu ku yeelanayaa sharcigaan marka lagu dhawaaqo oo si rasmi ahna loogu soo daabaco bogga Wasaaradda taas oo ah shuruudaha xeerarka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee uu ansixiyay Wasiirka, sida ku xusan farqada(2aad) ee hoose, waajibaadkaana waa in uu u hoggaansamaa haddii uu yahay milkiilaha, Naaquudaha iyo / ama kabtanka markab kasta ama muwaadinka soomaliyeed.

2) Marka laga soo tago faqrada (1aad), marka aanay suurtagal u aheyn markabka in uu buuxiyo shuruudaha oo uu u hogaansamo sababo farsamo oo loo qaateen ah , Agaasimaha Guud waxa uu u kordhin karaa waqti macquul ah si loogu oggolaado in uu soo dhammaystirto waxyaabaha ka dhiman.

3) Agaasimaha Guud waxa uu ogeysiinayaa dhammaan dadka haysta ruqsadaha iyo oggolaanshaha waajibaadyada la xiriira Hirgelinta hannaanka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee ku saabsan tariikhda la baahiyey.

4) Qof kasta oo ka hor yimaada fulinta xeerarka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah sida uu qabo qodobkan ama sida ku xusan xeerkan waxa uu galay dembi waxa uuna mutaysanaya xukun ciqaabeedka ku xusan jadwalka koowaad iyo/ama ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro Xeerkan.

Qodobka 16

Horumarinta Kalluumaysatada iyo Kalluun Beerista

Wasaaradda oo kaashanaysa Wasaaradaha Dowlad-goboleedyada ee u xilsaaran kalluumeysatada waxa ay horumarin doonaan kalluumeysiga iyo kalluun beerista, oo ay ka mid yihiin ganacsiga kalluumeysiga waaweyn, dhexe iyo yaryar iyada oo la waafajinayo siyaasadda qaranka iyo qorshayaasha horumarineed iyo Sharcigaanba, lana soo saarayo xeerar iyo hawlo la

xiriira sida:

a) Horumarinta maalgashiga, shaqada iyo tayeynta shaqaalaha;
b) Horumarinta suuqyada iyo suuqgeynta wax soosaarka kalluunka iyo kalluun beerista.
c) Dhiirrigelinta iskaashiga kalluumeysatada iyo beerista kalluunka ee ka jira dalka.
d) Kor u qaadista xirfadaha iyo hufnaanta kalluumeysiga iyo beerista kalluunka;
e) Horumarinta kaabayaasha iyo gacan siinta kalluumeysatada.
f) Ilaalinta bii'ada kalluunka; iyo
g) Sameynta iyo isku dubaridka cilmibaaris ku saabsan kalluunka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 17
Qorshayaasha Horumarinta Maamulka Kalluumaysiga

1) Wasiirku waxa uu mudnaan siin karaa horumarinta kalluumeysiga iyada oo ujeeddadu tahay hirgelinta maareynta kalluumeysiga iyo qorshayaasha horumarineed, laguna xisaabtamayo talooyinka Wasaaradda, latashiga Dowlad-goboleedyada, daneeyeyaasha, hay'adaha kalluumeysiga ee gobolka iyo xeerarka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee ay qaateen ururrada maareynta kalluumaysiga ee gobolka.

2) Maareynta kalluumaysiga iyo qorshaha horumarintu waxa uu dhaqangelayaa markii uu oggolaado wasiirka iyo wasiirada u xilsaaran kalluumeysiga ee Dowlad-goboleedyada, laguna daabaco Faafinta rasmiga ah iyo bogga Wasaaradda, xeerarka maareyntuna waxa ay ahaan doonaan sharci marka loo eego faqrada (8aad) ee hoos ku xusan.

3) Maareyn iyo qorshe kasta oo kalluumaysi waa inay ahaadaan mid waafaqsan ujeeddada iyo mabaadi'da Xeerkan laguna dhaqaa dadka, maraakiibta, kalluunka iyo kalluumeysiga iyo howlaha la xiriirasida uu qabo Xeerkan.

4) Maareynta kalluumeysi kasta iyo qorshaha horumarineed waa in:

a) Lagu caddeeyaa kalluumeysiga iyo sifihiisa, sida:

i. Xaaladda kalluumaysiga iyo kheyraadka ee markaa jirta sida; aagga, sinjiyada kalluunka iyo wax dheefkiisa;

ii. Saameynta taban ee kalluumeysigu ku yeelan karo kheyraadka iyo deegaanka;

iii. Xaaladda kheyraadku ku sugan yahay sida sinjiyada dhawrsan, kuwa loo baqo ama kuwa khatarta ku jira marka loo eego sharciga kalluumaysiga Soomaaliya iyo heshiisyada caalamiga ah;

iv. La jaanqaadi kara xeerarka heer gobol iyo heer caalami;

b) lagu caddeeyaa ujeeddooyinka maamulka iyo istiraatiijiyadda kalluumaysiga, iyadoo laga eegayo dhinacyada bayoolojiga, deegaanka iyo dhaqan-dhaqaalaha;

c) Lagu muujiyaa habsami u socodka iyo hirgelinta maaraynta kalluumeysiga iyo qorshaha horumarinta, sida la tashiyada lala yeelanayo daneeyayaasha, kuwaas oo saameyn ku leh qorshaha la soo jeediyey;

d) Lagu cadeeyaa xeerarka maareynta iyo horumarinta si loogu dabbaqo kalluumeysiga;

e) Lagu qeexaa qorshayaal xilleedka la socodka iyo dib u eegista kalluumeysiga iyo qorshaha Maareynta Kalluumeysiga;

f) Loo sameeyo sida ugu habboon qodobbo la xiriira arrin kasta oo lagama maarmaan u ah ilaalinta, maaraynta iyo isticmaalka joogtada ah ee kalluumeysiga;

g) La soo bandhigo qabyo qoraalka qorshaha si dib u eegis loogu sameeyo;

h) In ay Wasaaraddu keydiso si ay u noqoto xog dhexe oo la wadaagi karo;

i) Wasiirku waxa uu fari doonaa in Qorshaha lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Dowladda;

5) Magdhaw lama bixin doono marka maareynta kalluumaysiga iyo qorshaha horumarinta la sameeyo ama wax laga beddelo ama wax walba oo hore loo oggolaaday la maminuuco ama lagu sharciyeeyo qorshahan, laakiin tani kama hortagi doonto qorshaha ama shuruucda lagu bixinayo magdhawga.

6) Wasiirku waxa uu amar ku bixin karaa ama sharci ku sameyn karaa xeerarka maaraynta, ganaaxyada, ciqaabaha iyo sidoo kale fulinta awoodaha, maamulka iyo shuruudaha kale ee ku saabsan qorshaha Maareynta Kalluumeysiga.

Qodobka 18
Cilmibaaris Ku Saabsan Ilaalinta Iyo Maarayn Wax Ku Oolka Ah

1) Daraasad kasta oo ku saabsan arrimaha ku xusan sharcigan waxaa fulinaysa Wasaaradda ama ciddii kale ee buuxisa shuruudaha cilmi-baaris, ama iyada oo la haysto:

a) Oggolaansho cilmibaaris ay soo saartay Wasaaraddu sida ku qoran qodobkan;

b) Fasax lagu bixiyey shuruudaha ruqsadda lagu soo saaray sida uu qabo sharcigan; ama

c) Qoraal uu saxiixay Agaasimaha guud laguna daabacay bogga rasmiga ah ee wasaaradda.

2) Dhammaan macluumaadka, xogta iyo natiijooyinka ka soo baxa cilmibaarista uu oggolaaday Xeerkan waxay noqon doonaan:

a) Hanti dowladeed; oo

b) Si dhakhso ahna loogu soo tebiyo Wasaaradda qaabka iyo waqtiga uu Agaasimaha Guud u dalbado.

3) Qofna ma daabici karo natiijooyinka cilmibaarista arrin kasta oo Xeerkan ku xusan iyada oo aan la soo ogeysiin Wasaaradda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

4) Wasaaradda, oo gudaneysa waajibaadkeeda la xiriira cilmibaarista, waa inay:

a) Taageertaa oo dhiirigelisaa tayada aqoonta muwaaddiniinta Soomaaliyeed si ay u sameeyaan cilmibaaris wax ku ool ah.

b) Ka qeyb galaan khubaro Soomaaliyeed ilaa xad intii suurtagal ah marka cilmibaarista shisheeye hoggaaminayaan; iyo

c) Meesha ay khusayso, lagu biiriyo cilmibaaris ama talo cilmi ah oo ay bixisay hay'ad kasta oo ay khusayso oo ka tirsan Dawladda ama Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobol.

5) Qof kasta oo jebiya faqrada (1) (a), (b) ama (c), (2) (b) ama (3) ee qodobkan waxa uu galay dembi waxa uuna mutaysanayaa in lagu xukumo ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xarig aan ka badnayn 6 bilood, ama labadaba, weliba waa in la keenaa Wasaaradda dhammaan macluumaadka, xogta iyo natiijooyinka.

Qodobka 19

Soo Saarista Digniino Ku saabsan Noocyada Kalluun Ee U Baahan ilaalinta ama Khatar ugu Jira Inay Dabar-Go'an

1) Wasiirku waxa uu Faafinta Rasmiga ah ama bogga rasmiga ah ee Wasaaradda ku baahin karaa ama ku soo saari karaa nooc kasta oo kalluun ah oo ku jira biyaha Soomaaliya:

a) In uu yahay mid dhawrsan, loo baqo ama khatar ku jira marka loo eego heshiiska caalamiga ah ama xeerka ururka maareynta heer gobol ee ay khusayso; ama

b) In Agaasimaha Guud uu caddeeyo in uu yahay noocyada dhawrsan, loo baqo ama khatar ku jira marka loo eego caddeynta ugu wanaagsan oo cilmiga ku dhisan ee la heli karo.

2) Qofna ma qaadi karo, ma dejin karo, ma iibin karo,macaamil kama geli karo, ma daabuli karo, ma qaban karo, ma gadi karo, ma haysan karo, ma soo dejin karo mana dhoofin karo wax kalluun ah ama waxsoosaar kalluun ah ee la caddeeyay inuu yahay mid dhawrsan,loo baqo ama khatar ku jira si waafaqsan qodobkan.

3) Qof kasta oo soo qabta sinji kalluun dhawrsan,loo baqo ama khatar ku jira waa inuu siidaayaa isaga oo noolna biyaha ku soo celiyaa.

4) Qof kasta oo jebiya faqrada (2) ama (3) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa in lagu xukumo ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xarig aan ka badnayn 6 bilood, ama labadaba,weliba kalluunka ama wax soo saarka kalluunka waxaa la wareegaya Dawladda

Qodobka 20

Cayimida Goobo Ama Aagaga

1) Wasiirka oo la tashanaya Wasiirrada Dowlad-goboleedyada ee kalluumeysiga, waxa uu cayimi karaa aag ama goob kasta oo ka mid ah biyaha Soomaaliya isaga oo ku soo daabacaya Faafinta Rasmiga ah, ama bogga wasaaradda ama xeer, iyada oo ay ujeeddadu tahay;

a) Ilaalinta, maaraynta, dhowrista ama soo kabashada kalluunka ama kalluun beerista;

b) Horumarinta warshadeynta kalluumeysiga ama kalluun beerista Soomaaliya; iyo

c) Ujeeddo kasta oo kale oo la jaanqaadaysa hadafka iyo mabaadi'da Xeerkan.

2) Qofna waxba kama qaban karo, umana oggolaan karo qof kale inuu wax hawl ah ka qabto; taas oo:

a) Ah Goobta ama aagga la mamnuucay sida ku xusan faqrada(1aad) ee qodobkan;

b) Keeneysaa burbur ama saameyn taban oo ku timaad kheyraadka kalluumeysi ee goobta ama aagga ku xusan faqrada(1aad) ee qodobkan; ama

c) Sababi karta in ujeeddada loo sameeyey goobahaas la gaari kari waayo.

3) Qof kasta oo jebiya faqrada (2aad) ee qodobkan waxa uu galay dembi, waxa uuna mutaysanayaa in lagu xukumo ganaax aan ka yareyn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xarig aan ka badnayn saddex sano ama labadaba. Sidoo kale, jebinta faqrada (2aad) xarafka (b) waxaa lagu muteysan doonaa magdhow buuxa sida ay maxkamaddu go'aamiso, wixii burburin ama saameyn taban ah ee loo geysto goobtana sideedii hore ayaa lagu soo celinayaa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 21
Bedqabka Deegaan Badeedka

1) Qofna iskuma dayi karo, qof kalena uma suurto gelin karo in uu adeegsado, si toos ah, si dadban, kas ah ama si kama' ah, walax kasta oo dhibaato u keeni karta biyaha Soomaaliya kuwaas oo:

a) sun leh, khatar ah ama waxyaabo kale oo waxyeelo u keeni kara kalluunka ama deegaankiisa, shimbiraha, aadanaha ama noole-biyoodka ama bay'ada badda, oo ay ka mid yihiin wasakhda warshadaha ama qashinka nugliyeerka;

b) Carqaladeyn kara ama khatar gelin kara howlaha kalluumeysiga; ama

c) Caqabad ama khatar ku noqon Kara marinnada badda.

2) Naakhuudaha markab kasta waa inuu isticmaalaa agab aan waxyeelayn kalluunka iyo deegaankiisa marka loo baahdana Wasiirku ku soo saarayaa faafinta rasmiga ah ama bogga wasaradda ama shuruudda ruqsad siinta.

3) Qofna ugama tegi karo goob ama meel ka mid ah biyaha Soomaaliya qalab kalluumeysi oo dhibaato u keeni karaya noole-biyoodka iyo deegaanka, haddii ay dhacdo xaalad shil degdeg ah waa in naakhuuduhu soo wargaliyaa Agaasimaha Guud.

4) Agaasimaha Guud waxa uu amri karaa in qalabka ama shay kasta oo kale oo aan dhibaato keenayn l sida ku xusan faqrada (3aad) in uu ka qaado meesha qof loo idmay, haddii ay u keenayso deegaanka khatar ama caafimaad-darro ku timaadda kalluunka, wixii kharash ah ee ku baxaya qalabka ama shayga qaadistiisa waxaa lagu dallacayaa qofka ama dadka meesha uga tegay.

5) Marka laga soo tago faqrada (1aad), haddii ay dhacdo in walxo waxyeello leh ama wasakh ah uu markab si kama' ah ama aan ku talagal aheyn u geliyo deegaanka badda; Naakhuudaha markabku waa inuu si dhakhso leh dhacdada ugu soo wargeliyaa Agaasimaha Guud, isaga oo soo gudbinaya macluumaadka soo socda:

a) Magaca Naakhuudaha;

b) Magaca, calaamadda iyo lambarka uu ku diiwaangashan yahay markabku;

c) Nooca iyo waxa ay wasakhda ka samaysan tahay;

d) Qiyaasta xaddiga wasakhda;

e) Taariikhda iyo waqtiga; iyo

f) Goobta.

6) Qofkii jebiya Faqrooyinka (1), (2), (3) ama (5) wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo magdhaw buuxa oo laga bixiyo wixii khasaaro ama waxyeelo ah ee ka dhasha arrinkaas iyo sidoo kale wixii qarash ah ee ku baxa in sideedii hore lagu soo celiyo deegaankii ay dhibaatadu saameysey.

Qodobka 22
Mamnuucista Burburinta Geedka Maanguruufka iyo Dhirta Kale, Si Loo Ilaaliyo Deegaan Xeebeedka Kheyraadka Kalluumaysiga

1) Ujeeddo kasta oo la xiriirta horumarinta ganacsi aag xeebeed iyada oo aan oggolaansho laga helin Wasiirka sida ku xusan qodobka 74-aad; Qofna waa in uusan:

a. goynin ama ka ganacsan geedka loo yaqaan mangrove-ka ama noocyo kale oo geedo ah oo kheyraadka kalluunka u leh manfac ama cunto iyo ilaalinta nabaad-guurka carrada;

b. degin, ku qaban howlo ganacsi ama howlo kale oo saameyn ku leh kalluumeysiga iyo deegaan xeebeedka badda.

2) Qofna cilmibaaris kuma sameyn karo aag xeebeed kasta, taasoo la xiriirta meelaha xeebta ah ee deegaanka u ah khayraadka kalluumeysiga iyada oo aan oggolaansho laga helin Wasiirka sida ku xusan qodobka 74-aad.

3) Qofkii jebiya faqrooyinka (1) (a) ama (b) ama (2) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo magdhaw buuxa oo laga bixiyo wixii khasaaro ama waxyeelo ah ee ka dhasha arrinkaas iyo sidoo kale wixii qarash ah ee ku baxa in sideedii hore lagu soo celiyo deegaankii ay dhibaatadu gaartay sida ay maxkamad sharci ah go'aamiso.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 23
Mamnuucista Burburinta Shacaabiga (Qara-dhagaxeedka) iyo Bocoolaha Badda, Si Loo Ilaaliyo Deegaan Xeebeedka Kheyraadka Kalluumaysiga

1) Qofna ma burburin karo kamana ganacsan karo Qar-dhagaxeedyada badda ee manfaca ama cuntada u ah kalluunka badda, sidoo kale ma burburin karo kamana ganacsan karo aleel badeedda:
a) Iyada oo an oggolaansho laga helin Wasiirka sida ku xusan qodobka 74-aad: ama
b) Ilaa ay ku taal aag ay Wasaaraddu u aqoonsatay hawlaha horumarinta si dib loogu soo celiyo ama loo abuuro qar dhagaxeedka ama hawlo kale oo la mid ah waxqabadyadaas.
2) Qofna ma isticmaali karo qalab sababi kara burburin inta uu ka kalluumeysanayo dusha ama agagaarka qar badeedyada ku yaal biyaha soomaaliya, qalabkaas oo ay ka midka yihiin:
a) Biraha looga soo jiido aargoostada meelaha ay ku gambato; iyo
b) Maqaalinnada waaweyn oo lagu soo qabto kalluunka hoose.
3) Qofkii jebiya faqradaha(1) (a) ama (b) ama (2) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo magdhaw buuxa oo laga bixiyo wixii khasaaro ama waxyeelo ah ee ka dhasha arrinkaas iyo sidoo kale wixii qarash ah ee ku baxa in sideedii hore lagu soo celiyo deegaankii ay dhibaatadu gaartay sida ay maxkamad sharci ah go'aamiso.

QEYBTA 2AAD

TALLAABOOYINKA MAAMUL IYO WAXYAABAHA REEBAN

Qodobka 24
Maareynta Kalluumaysiga Aan Loo Qasdin

1) Naakhuudaha markab kasta oo warshad leh ama aan laheyn, kaasoo kusoo dejiya ama iska roga kalluunka laga jilaabtay biyaha Soomaaliya sida; Tuunaha iyo Tuuna-u-eke, waxa uu ku dajinayaa dhammaan kalluunka aan loo qasdin (By Catch) meel laga heli karo kaabayaal dhaqaale, Agaasimaha guudna uu jiheeyo dejintaas; iyada oo la tix-raacayo xeerarka Hay'adda Cunada iyo Beeraha ee (FAO) oo ku saabsan Calaamadeynta agabka Kalluumeysiga, milkiilaha ama Naakhuudaha agabkaas waa inuu u hoggaansamaa shuruudahaas.
2) Howl-wadeenka markab kasta oo ka shaqeeya biyaha Soomaaliya, ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo ka shaqeeya meelaha ka baxsan dalka iyo meelaha uu kataliyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee gobolka waa inuu hubiyaa in qalabka badda ku jira si sax ah loo calaamadeeyay iyada oo la raacayo ugu yaraan xeerarka iyo shuruudaha kale ee Wasaaraddu soo rogto, marka laga reebo cafiska uu wasiirku u fidiyo markab kasta ama qalab kasta:
a) Darafyada shabaagyada, xargaha iyo agabka badda ku dhex jiraa; waa in lagu rakibaa calan ama raadaar ifbixiya habeen iyo maalinba iyo booyad si fudud u muujinaysa qalabka ama shabaqa booskiisa iyo baaxaddiisa;
b) Booyadda iyo walxaha la midka ah ee dul sabbeeynaya biyaha, ee loogu talagalay in lagu muujiyo meesha uu yaallo agabku, waa in markasta si sax ah loogu calaamadeeyaa xarafka (xarfaha) iyo / ama lambarka (lambarada) markabka ay ka tirsan yihiin;
c) Booyad kasta oo loo isticmaalo dhigidda Shabaqa waafi-qabadka, jeestada iyo shabaq dhigga kale, waa in lagu suntaa lambarka ruqsadda ama calaamadda aqoonsiga markabka isticmaalaya qalabka;
d) Calaamadaha aqoonsigu waa inay ku jiraan xarfo iyo lambaro;
e) Xarfaha iyo lambarradu waa inay weynaadaan si ay meel fog uga muuqdaan sida booyadda;
f) Calaamadda aqoonsigu waa inay ahaataa caddaan ama madow middood, hadba midabka ay ahaataba waa in uu muujiyaa farqi weyn oo ka duwan midabka booyadda;
g) Rinjiga badda loo isticmaalo oo tayo wanaagsan leh waa in loo adeegsadaa qorista calaamadaha aqoonsiga;
h) calaamadaha aqoonsiga iyo derbigiisa gadaaleba waa in markasta si wanaagsan loo hagaajiyaa; iyo
i) Calaamadeyntu waa in ay waafaqsanaataa shuruudaha uu dejiyey Wasaaradda.
3) Howlgeliye kasta oo u hogaansami waaya shuruud kasta oo ku xusan farqada (1) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi wuxuuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 25
Aaladda Gabbaadka kalluunka

1) Howl-wadeenka Markab kalluumeysi:

a) Waa in aanuu dusha ku hayn, dhigin ama ku hayn Aaladda gabbaadka kalluunka gudaha Biyaha Soomaaliya;

b) Markab waa in aanu dhigin ama aanu oggolaan, Aaalad gabbaadka kalluunka ee sabeysa ayadoo ay la socoto booyad xog uruurin meelaha ka baxsan xeyr-xeyndaabka Qaranka si uusan u soo galin Biyaha Soomaaliya.

c) Markab soomaaliya ka diiwaan gashan waa in aanu dhigin ama aanu oggolaan in la geeyo Aaladda gabbaadka kalluunka oo ay la socota qalabka xog uruurinta badda meelaha Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee gobolka uu ka shaqeeyo;

Marka laga reebo oggolaanshaha Wasaaradda, kaas oo waafaqsan shuruudaha u yaal si waafaqsan sharciga iyo xeerka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah.

2) Howl-wadeen markab uu tilmaamaayo qodobka (1) waa in uu hubiyaa in Aaladda Gabbaad-Kalluumeedka:

a) si sax ah loogu calaamadiyey magaca milkiilaha markabka, qalabkaas oo lagu dhigay lambarka aqoonsiga ee markabka u gaarka ah ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, lambarka diiwaangelinta Aaladda Gabbaad-kalluumeedka, iyo lambarka Markabka ee Ururka Badaha Aduunka.

b) uu ku qalabeysan yahay Raadaarka ifbixiyaha ah, iyo nalal si fiican habeenkii looga arki karo masaafo dhan ugu yaraan hal mayl badeed; iyo

c) Uu leeyahay qalab kale oo la socda iyo calaamadaha la sheegay ama shuruudaha uga degsan Wasaaradda iyo xeerka ilaalinta iyo maareynta caalamiga ah.

3) Haddii aan si kale loola jeedin sharcigan ama sida ku qeexan ogolaanshaha Wasaaradda ee geynta Aaladda Gabbaad-kalluumeed aag cayiman, xuquuq gaar ah ma siineyso in laga kalluumaysto agagaarka aaggaas qofna kuma andocoon karo xaq uma yeelan doono in uu ku andacoodo.

4) Howl-wadeen markab kasta oo dhigaya Aaladda Gabbaad-kalluumeed waa inuu ku wargeliyaa Wasaaradda afar iyo labaatan saac gudahood qaabka dhigista iyo meesha la dhigayo sida uu dhigayo qodobka 27 ee faqrada 1aad xarafaha (a,b).

5) Oggolaansho ha u haysto ama yaanu u haysane, qofna uma isticmaali karo umana dhigi karo Aaladda Gabbaad-kalluumeed, qaab aan ka ahayn sida uu qabo sharcigan ama shuruudaha Wasaaradda u degsan.

6) Wasaaraddu waxa ay diyaarin doontaa qorshe maamul oo ku saabsan Aaladda Gabbaad-kalluumeedka, iyada oo tixgelinaysa shuruudaha ama tilmaamaha Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

7) Qofkii jebiya farqada (1) (a) (b) ama (c), (2) (a) (b) ama (c), (4) ama (5) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad marka loo eego Aaladda Gabbaad-kalluumeedka ama xabsi aan ka badnayn saddex sano ama labadaba, Aag Gabbaad-kalluumeed kasta oo lagu isticmaalo ama laga helo Biyaha Soomaaliya oo ku xadgudba Sharcigan waa lala wareegayaa, shirkadda keentay Aalad Gabbad-kalluumeedkana waa lagala noqon karaaa ruqsadda kalluumeysiga, haddii markab uu Aaalad Gabbaad kalluumeedka uga tago biyaha Soomaaliya waxaa markabkaas laga la noqonayaa ruqsadda waxaana lagu dalacayaa kharashaadka ku baxaya qaadista, nadiifinta, dib u celinta iyo dhammaan howlaha hagaajinta goobta, waxa ay dushiisa tahay howl-wadeenka ama mulkiilaha markabka uu qalabku ku xirnaa.

Qodobka 26
Mamnuucidda Ka Kalluumaysiga Aagga Booyadda Xog Uruurinta

1) Looma ogola hawlwadeen kasta oo ka shaqeeya maraaakiibta ku jirta biyaha Soomaaliya ama ka shaqeeya markab Soomaaliyeed meelaha uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga;

a) In uu keeno booyadda xog ururinta biyaha Soomaaliya ilaa Wasaaradda lagu soo wargeliyo howshaas isla markaana loo gudbiyo macluumaad kasta, sida waqtiga iyo qaabka loo rabo;

b) Inuu faragaliyo ama qaado booyadda xog ururunta ilaa uu oggolaasho ka helo Wasaaradda ama milkiilaha booyadda;

Waana inuu u hoggaansamo shuruudaha dheeriga ah ee ku saabsan booyadda xog ururinta sida hadba sharcigu u qeexo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Hawlwadeen kasta oo aan u hoggaansami waaya faqradaha (1), (a) ama (b) ee qodobkan waxa uu galay dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan.

Qodobka 27

Mamnuucidda Jillaabashada iyo Ka Ganacsiga Nibiriga Iyo Ilaalinta Carjowleyda, iwm.

1) Qofna kama shaqeysan karo, lagumana caawin karo ka ganacsiga iyo jillaabashada nibiriga iyo noocyadiisa biyaha Soomaaliya, muwaadinka Soommaaliyeed ama markab Soomaaliyeed xitaa ugama ganacsan karo nibiriga meelaha ka baxsan biyaha qaranka.

2) Qofna kama kalluumeysan karo, ma waxyeeleyn karo, ma dili karo, kamana ganacsan karo carjowley.

3) Hawlwadeen markab ka shaqeynaya biyaha Soomaaliya waa inuu hubiyaa in dhammaan kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira, sida agabka kalluumeysiga loo dhigo inuusan wax yeelaynaynin ama dhibaateynaynin bahda carjowleyda.

4) Hawlwadeenka markab kasta oo ku jira biyaha Soomaaliya ama maraakiibta Soomaaliyeed ee ku sugan meelaha uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga , waa in aanu si ula kac ah u sababin una oggolaan in la dhigo shabaagta wareegta agagaarka ama meelaha ay ku nool yihiin bahda carjowleyda iyo nibiriga.

5) Markii xayawaanaadka bahda carjowleyda si aan ula kac ahayn ugu dhaco dabinka ama qalabka kalluumeysiga, hawlwadeenku sida ku xusan farqada (4aad) waa inuu si deg deg ah u siidaayaa oo uu ku celiyaa badda, oo uu qaadaa talaabooyinka kale ee uu ka qabo Hannaanka Ilaalinta Iyo Maareynta Caalamiga ah.

6) Qofna looma oggola in uu hawlo kalluumaysi ka qabto aagagga sharcigani u aqoonsaday in uu yahay aagagga taranka bahda carjowleyda,

7) Markii xayawaanaadka bahda carjowleyda uu ku dhaco dabin la dhigay xeebta agteeda, bulshooyinka xeebtaas ku nool waxaa waajib ku ah inay sii daayaan oo ay dib ugu celiyaan biyaha Soomaaliya.

8) Qof kasta oo aan u hoggaansamin wax kasta oo looga baahan yahay faqradaha(1), (2), (3) (4) (5) ama (6) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi, waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.

Qodobka 28

Mamnuucidda La Xiriirta Qubo Badeedka

1) Qofna kama jillaaban karo, ma waxyeeleyn karo, ma dili karo, kamana ganacsan karo qubo badeedda.

2) Hawlwadeenka markab ka shaqeynaya biyaha Soomaaliya waa inuu hubiyaa in dhammaan kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira, sida agabka kalluumeysiga loo dhigo hab dhibaateyn kara qubo badeedda.

3) Hawlwadeenka markab kasta oo ku jira biyaha Soomaaliya ama maraakiibta Soomaaliyeed ee ku sugan meelaha uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta kalluumaysiga , waa in aanu si ula kac ah u sababin una oggolaan in la dhigo shabaag agagaarka ama meelaha ay ku nooshahay qubo badeeddu.

4) Markii qubo badeed si aan ula kac ahayn ugu dhaco shabaqa ama qalabka kalluumeysiga, hawlwadeenku sida ku xusan farqada (3aad) waa inuu si deg deg ah u sii daayaa oo uu ku celiyaa badda, oo uu qaadaa talaabooyinka kale ee uu ka qabo Hannaanka Ilaalinta Iyo Maareynta Caalamiga ah.

5) Ujeeddo kasta oo la xiriirta horumarinta ganacsi ee aag xeebeed kasta, sida uu qabo qodobka 74aad; Qofna ma dhisi karo, kama shaqeyn karo, cilmibaarisna kama sameyn karo aagagga taranka ee qubo badeedda, iyada oo aan oggolaansho laga helin Wasaaradda.

6) Qof kasta oo aan u hoggaansamin faqradaha (1), (2), (3) (4) ama (5) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.

Qodobka 29

Mamnuucidda Goynta Dhegaha Libaax-Badeedka Iyo Ka Ganacsiga Dhegihii Lagu oo jaray sifo sharcidarro ah

1) Hawlwadeenka markab kasta oo ka kalluumeysanaya biyaha Soomaaliya ama markab Soomaaliyeed oo ka kalluumeysanaya meelaha ka baxsan Soomaaliya:

a) waa inuu hubiyaa in dhammaan libaax-badeedyada la qabtay si buuxda looga faa'iideystay, iyada oo lagu hayo markabka dushiisa dhammaan qaybaha libaax-badeedka, marka laga reebo madaxa, caloosha iyo hargaha, ilaa laga soo gaaro marsada ugu soo horraysa ee lagu dejinayo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b) waa in:

i.Aan libaax-badeedka maraakiibta dushooda dhegaha looga goynin; iyo

ii.Aan la dejin, lagu sii heyn markabka dushiisa, markab kalena lagu wareejin, ama aan la keenin dhego-libaax oo aan ku dhegganeyn libaax-badeedkii marsada ugu horreysa ee lagu dejinayo;

c) Marka libaax-badeedka la dejinayo uu yahay mid la qaboojiyey waa in:

i.Aanay saarneyn dhego libaax oo wadarta culeyskoodu ka badan yahay 5% marka loo eego Culayska guud ee libaax-badeedka ilaa iyo marsada ugu horreysa ee lagu dejinayo, iyada oo shuruudaha ku xusan faqrada (b) aanu hawlwadeenku dhaqan gelin;

ii.Aan loo dejin hilibka iyo dhegaha libaax-badeedka si gooni gooni ah marsada ugu horreysa ee lagu dejinayo, ilaa iyo inta la waafajinayo 5% caddaynta kormeeraha, ama xeerarka kale ee ku habboon ee Wasaaraddu ogolaatey.

2) Si loo beekhaamiyo mugga qolka qaboojinta ee markabka sida ku cad faqrada (1) xarafka (c) ee qodobkan; dhegaha libaax-badeedka qayb ahaan waa la jarjari karaa oo lagu laabi karaa hilibka libaax-badeedka korkiisa, laakiin waa inaan laga goyn ilaa marsada ugu horeysa ee lagu dejinayo.

3) Hawlwadeenka markabku waa inuu sii daayaa ama fududeeyaa sii deynta sida ugu dhaqsaha badan sinjikasta oo libaax-badeed ah oo aanu sharciga kalluumeysigu oggoleyn si aan ula kac aheyna loo qabto, markii la keeno markabka dhinaciisa asaga oo nool; waana inuu ku sameeyaa arrinkaas sida ugu macquulsan ee loo yareyn karo waxyeelo loo geysto libaax badeedka.

4) Qofna ma soo gadan karo mana iibin karo dhegaha libaax-badeedka laga gooyey oo la soo raray, la sii hayey, la soo wareejiyey ama lagu dejiyay si ka hor imanaysa Sharcigan.

5) Qof kasta oo jebiya farqada (1) (a), (b) ama (c), (2), (3) ama (4) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn labo sano, ama labadaba. Weliba, kalluun ama wax soo saar kalluun ee kasta oo aan waafaqsaneyn shuruudaha ku xusan farqada (1) waxaa la wareegaysa Dowladda.

Qodobka 30

Mamnuucista Hababka Kalluumaysiga Loo Adeegsado Qaraxyo Iwm, Iyo Ka Ganacsiga Kalluunka Lagu Soo Jilaabto Hababkaas

1) Qofna waa in:

a) Aanu isticmaalin, oggolaanshana loo siin in uu isticmaalo ama isku dayo in uu isticmaalo wax kasta oo qarxa, sun ah ama walax kale oo waxyeello leh, ujeeddadeeduna tahay in lagu dilo, lagu daandaamiyo, lagu naafeeyo kalluunka ama si kasta oo sahali karta in kalluunka lagu soo qabto;

b) Aanu la raacin markab, gaadiid ama wax kasta oo uu leeyahay ama gacanta ku hayo walxaha qarxa, sun ah ama walax kale ah oo waxyeello u geesan kara noole-biyoodka ujeed kasta oo ku xusan xarafka kore ee (a);

c) Aanu dejin, iibin, qaban ama haysan wax kalluun ama wax soo saar kalluun ah, iyada oo la ogyahay ama loo hayo sabab macquul ah oo la rumaysan karo in lagu soo jillaabtay iyada oo lagu xadgudbay xarfaha kore ee (a) ama (b).

2) Waxyaabaha qarxa, sunta leh, ama walxaha kale ee halista ah ee laga helo markabka dushiisa waxaa loo qaadanayaa, in loola jeedo ujeeddo kasta oo ku xusan farqada (1) (a) haddii aan la caddaynin ujeeddo taas ka duwan,

3) Qofkasta oo jebiya faqrada (1) (a), (b) ama (c) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn labo sano, ama labadaba. Weliba, kalluun ama wax soo saar kalluun ee kasta oo aan waafaqsaneyn shuruudaha ku xusan farqada (1) waxaa la wareegaysa Dowladda.

Qodobka 31

Mamnuucidda Hababka Kalluumaysiga Jariifka Ah

1) Qofna ma isticmaali karo mana dhigan karo shabaagta jariifka isaga oo ka kalluumaysanaya biyaha Soomaaliya.

2) Qof kasta oo jebiya farqada (1) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn labo sano, ama labadaba. Weliba,

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

kalluun ama wax soo saar kalluun ee kasta oo aan waafaqsaneyn shuruudaha ku xusan farqada (1) waxaa la wareegaysa Dowladda.

Qodobka 32

Hababka Kalluumeysi Ee La Mamnuucay - Cabbirka Ugu Yar Agabka Kalluumeysiga

1) Wasiirka ayaa xeer hoosaad ku qeexaya shuruudaha cabbirka ugu yar ee agabka kalluumaysiga, wuxuuna ku soo saarayaa faafinta rasmiga, waxaa lagu baahinayaa bogga wasaaradda.

2) Qofna ma isticmaali karo shabaag kalluumeysi oo cabbirka ishiisu ka yar tahay 50mm.

3) Qofna uma adeegsan karo kaluumeysiga agab nooc kasta oo cabbirkoodu ka yar yahay inta uu wasiirku u qeexay si uu u soo qabto kalluunka tarmaya ee jooga aagga taranka.

4) Qof kasta oo jebiya faqrada (1), ama ku xadgudba farqadaha (2) ama (3) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn labo sano, ama labadaba. Weliba waxaa intaas dheer, kalluun ama wax soo saar kalluun ee kasta oo aan waafaqsaneyn shuruudaha ku xusan farqadaha (1), (2) ama (3) ee qodobkaan waxaa la wareegaysa Dowladda.

Qodobka 33

Hababka Kalluumeysi Ee La Mamnuucay - Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer

1) Ujeeddooyinka qodobkaan:

a) "Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer" micnaheedu waa waafi-qabad ama shabaagyo kale oo la isku xiriiriyay, kuwaas oo dhererkoodu gaaro in ka badan laba kilomitir iyo bar (2.5 km), ujeedadooduna tahay in lagu qabto ama lagu margiyo kalluunka, shabaagtaas oo ku dul sabbeysa biyo sare ama biyo dhexe;

b) "Habeynta" adeegsiga Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer macnaheedu waa in la soo raro qalab isku xiran oo si wada jir ah markabka ugu oggolaanaya inuu dhigo ama soo ceshado Shabaagta waaweyn ee sabbaysa.

2) Hawlwadeenka markab kasta oo ku jira biyaha Soomaaliya, ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo ka hawlgala meelaha ay ka shaqeeyaan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga amaba haddii kale meelaha ka baxsan biyaha Soomaaliya ma isticmaali karo Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer.

3) Hawlwadeenka markab waxaa loo arkayaa in uu adeegsaday Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer marka laga helo markabkiisa dushiisa, isaga oo ka hawlgalaya biyaha Soomaaliya ama meelaha ay ka shaqeeyaan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

4) Sida uu qabo Sharcigaan hawlwadeenka markab loo qaabeeyey inuu adeegsado Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer, waa inuu hubiyaa in shabaagtaas iyo qalabka kalluumaysiga ee la xiriiraba lagu xareeyo ama loogu xiray markabka qaab aan si fudud loogu kalluumeysan Karin.

5) Hawlwadeenka markab u hogaansami waaya faqradaha (2), (3) ama (4) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn shan sano, ama labadaba. Weliba waxaa sii dheer, qalabka la mamnuucay waxaa la wareegaysa Dowladda, wixii ciqaab kale ah ee Sharcigani ka qabana waa korkiisa.

Qodobka 34

Mamnuucid Isticmaalka Diyaaradaha Iyo kuwa Aan Duuliyaha Lahayn

1) Hawlwadeenka markab kasta, ha haado mid taageero, mid saad ama mid gargaar ee ku jira biyaha Soomaaliya ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo ka hawlgala meelaha ay ka shaqeeyaan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga , waa in aanu kalluumaysi u adeegsan diyaarado, sida diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, iyo dayax gacameedka ilaa Wasaaraddu oggolaato.

2) Diyaaradaha iyo gaadiid cireedka aan duuliyaha lahayn waxaa loo isticmaalaa ujeeddooyinka la socoshada, xakamaynta ama dabagalidda hab cilmi ah kumana jirto waxyaabaha lagu mamnuucay faqrada (1aad) ee qodobkan.

3) Hawlwadeen kasta oo u hogaansami waaya sharuud kasta oo ku xusan farqada (1), marka laga reebo farqada (2), ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo sharcigan lagu soo saaro.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 35

Mamnuucidda Isticmaalka Nalalka Macmalka Ah Si Looga Soo Jiito Kalluunka Masaaafooyin dhaadheer

1) Hawlwadeenka:

a) Markab kasta oo ku jira biyaha Soomaaliya oo ku qalabaysan shabaagta wareegsan iyo jeestada kalluumaysiga;

b) Markab taakuleyn, saad ama markab gargaar oo ku jira biyaha Soomaaliya; ama

c) Markab Soomaaliyeed oo ku sugan aagagga ka baxsan biyaha Soomaaliya ee uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

Waa ka mamnuuc isticmaalka, ku rakibidda ama ku shaqeynta nalalka macmalka ah ee biyaha dushooda ama hoostooda lagu ifiyo, oo ay ku jiraan aaladaha gabbaad kalluumeedka, iyada oo ay ujeeddadu tahay isu-geynta ama isu soo ururinta nooc kasta oo kalluun ah.

2) Nalalka badmaridda iyo nalalka lagama maarmaanka u ah hubinta xaaladaha bedqabka shaqada qaybtani ma saamaynayso.

3) Hawlwadeen kasta oo u hogaansami waaya shuruud kasta oo ku xusan farqadda (1) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo sharcigan lagu soo saaro.

Qodobka 36

Mamnuucidda Faragalin Ama Burburin Hanti Qof Kale oo dhex taal Biyaha Soomaaliya

1) Marka la joogo biyaha Soomaaliya Qofna kalluun kalama bixi karo shabaag haddii uusan ahayn mulkiilihii, ama uu qofkaasi ku shaqeynayo oggolaansho uu ka helay milkiilaha.

2) Qofna ma faragalin karo, ma burburin karo, ma waxyeelayn karo, si ogaal ama ula kac ahna uma cuuryaamin karo qalab kasta oo shaqeynaya, xarun kalluun beeris ama hanti kale oo uu leeyahay qof kale ama Dowlad, iyada oo aan ogolaansho laga helin milkiilaha ama dowladda, ama haddii loo arko lagama maarmaan in meesha laga qaado si aysan kalluunka iyo deegaankaba khatar ugu keenin, waana in si dhaqso ah Wasaaradda loogu war geliyaa.

3) Qodobkani ma xaddidayo awoodaha qof loo idmaday inuu ka saaro badda walxaha hoos u dhigaya tayada deegaanka badda, ama looga hortagayo daadinta aaladaha ama qalabka aan si aan waafaqsaneyn sharcigaan.

4) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (1) ama (2) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn hal sano, ama labadaba.

Qodobka 37

Isticmaalka, Markab Ku Haysashada, Soo Dejin, Soo Gadasho, Sii Iibin Qalab La Mamnuucay

1) Wasiirku waxa uu soo saari karaa sharci uu ku mamnuucayo isticmaalka, markab ku haysashada, soo dejinta, soo gadashada, sii iibinta qalabka la mamnuucay.

2) Qofna ma isticmaali karo, markabka korkiisa kuma haysan karo, ma soo dejin karo, ma soo gadan karo, ma sii iibin karo qalabka wasiirku uu sharcigan ku mamnuucay sida ku cad farqada (1).

3) Qofna ma isticmaali karo, ma abaabuli karo umana oggolaan karo in la isticmaalo, hawlwadeen markab kuma qaadi karo qalab ilaa iyo inta looga fasaxayo ama looga oggolaanayo shatiga qalabka la xiriira, oggolaansho ama fasax aan ka aheyn qalabka mamnuuca ah waa lagu qaadi karaa Markabka marka uu hawlwadeenku qalabka u soo sheego Agaasimaha Guud ka hor inta aanu soo galin biyaha soomaliya isla markaana uu qalabka ku haysto markabka oo aanu dhigin inta uu ku jiro biyaha soomaaliya.

4) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (2) ama (3) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba. Waliba qalabka la mamnuucay waxaa la wareegaysa Dowladda.

Qodobka 38

Mamnuucidda Bad uga Tagista Ama ku Tuuridda Qalab, Kalluun ama Wax Soo Saar Kalluun

1) Qofna si kas ah ama kama' ah ugama tagi karo ugumana tuuri karo qalab, kalluun ama wax soo saar kalluun oo la nacay biyaha Soomaaliya ama meelaha ka baxsan xeer-xeyndaab qaranka, ha ahaado muwaadin Soomaaliyeed ama markab Soomaaliyeed hala socdee;.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (1) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba. Weliba qalabka la mamnuucay waxaa lawareegaysa Dowladda.

Qodobka 39

Mamnuucidda Wax ka Badelka Cadeemaha Kalluunka Iyo Wax Soo Saar Kalluun Ee La Soo Baaray

1) Marka laga reebo Oggolaansho Qoraal ah oo Agaasimaha guud uu soo saaro; Qofna looma oggola;

a) In uu ka gooyo, beddelo ama farageliyo faahfaahinta la socota badeecada ganacsiga, Sajalka, shaabbadda, ama calaamadaha kale ee loo adeegsado kontaneerka ama nidaamka kontaneerada ay ku jiraan kalluun ama wax soo saar kalluun, kaas oo uu soo baaray sarkaal kalluumaysi oo idman;

b) in uu wax ku daro, wax ka reebo, ama haddii kale uu wax ka beddelo caddeynta ama shixnad kasta oo kalluun ah taas oo uu soo baaray soona hubiyey qof loo idmay; ama

c) Inuu furo ama ka jeexo sajalka sanduuqyada uu soo baaray sarkaalka idman ee kalluumeysiga.

2) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (1) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba. Weliba kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada waxaa lawareegaysa Dowladda.

Qodobka 40

Mamnuucid Haysasho, Ka Ganacsi, Dhoofin Kalluun Ama Wax Soo Saar Kalluun Ee Lagu Helay Ama Lagu Qabtay Si Ka Hor Imanaysa Sharcigan Ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah.

1) Qofna ma soo gadan karo, iibin karo, haysan karo, dhoofin karo kalluun ama wax kasta oo kalluun ka yimaada oo lagu helay ama lagu qabtay si ka hor imanaysa sharcigan ama Hannaanka Maaraynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah marka laga reebo in kalluunkaas ama wax kasta oo kalluun ka yimaada uu noqday hanti dawladeed kadib markii ay la wareegtay.

2) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (1aad) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba. Weliba kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada waxaa lawareegaysa Dowladda.

3) Marka qof lagu soo oogo fal-dembiyeedka ku xusan faqrada (1aad), waxaa laga rabaa in uu soo caddeeyo sifada uu kalluunka ku soo gatay, ku iibiyey, ku haystay, ku dhoofiyey ama sidii kale ee ay ahaataba, in ay waafaqsan tahay sharcigan iyo Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ahba.

Qodobka 41

Mamnuucid Ka Ganacsi Kalluun iyo Wax Soo Saar Kalluu oo ka Hor Imaaneya Sharci Dawlad Kale

1) Awooddiisa ha ahaato ama awood kale ha ahaatee qofna:

a) Uma fududeyn karo umana fasixi karo qof wakiil ka ah inuu qaato, gado, iibiyo, soo dhoofsado, dhoofiyo, soo dejiyo, rar u kala wareejiyo, gaadiid ku daabulo, ka ganacsado, ama helo kalluun ama wax kasta oo kalluun ka yimaada oo lagu soo dabtay si ka hor imaanaysa sharciyada Dawlad kale ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga, laakiin kuma jiraan kalluunka laga soo dabto biyaha caalamiga ah, taas oo Soomaaliya aanay u aqoonsanayn in kalluunkaasi ay dowladdaasi leedahay;ama

b) ma adeegsan karo ama u oggolaan karo markab loo adeegsado kalluumeysi ama hawlaha la xiriira ujeeddada ku xusan xarafka (a).

2) Marka laga soo tago sida ku xusan qodobkan, marka kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada ay sida ku xusan sharcigan uu noqdo hanti dawladeed, amar maxkamadeed ama nidaam sharci ah ayaa lagu iibin karaa, lagu dhoofin karaa ama haddii kale qofkii raba lagula macaamili karaa si la mid ah hantida kale ee dawladda, mana noqon doono wax soo saar sharci darro ah, ama kalluumeysi aan sharciyeysnayn,iwm.

3) Qof kasta oo ka hor yimaada shuruud kasta oo ku xusan faqrada (1aad) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba; weliba kalluunka iyo wax kasta oo kalluun ka yimaada waxaa la wareegaysa Dowladda.

4) Marka laga yimaado sharci kale oo Soomaaliyeed, faham khaldan laguma difaaci karo xadgudub ku xusan qodobka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 42
Mamnuucid Maraakiibta Ku Jirta Liiska Maraakiibta Kalluumeysiga Sharci Darrada Ah (IUU), oo Ay Gacanta Ku Hayso Hay'adda Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga.

1) Ujeeddooyinka qodobkaan, "markab liis garaysan" waxaa loola jeedaa markab ku jira liiska maraakiibta sharci-darrada ah, aan la soo sheegin iyo kuwa aan xakameysneyn ee ay hayso Hay'adda Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga.

2) Qofna Hawlwadeen kama noqon karo, markab Soomaaliyeed, ha ahaado mid kalluumeysi, mid gargaar, mid shidaal (saad), markab weyn oo maraakiibta kale ka saad qaataan ama markab xamuul:

a) Si uu u siiyo, ugu fududeeyo ama loo gacan siiyo si kasta ha ahaatee "markab liis gareysan" marka laga reebo in ujeeddadu tahay gacan siinta markabka ama qof saaran, in uu khatar ama dhibaato ku sugan yahay mooyee;

b) Si uu gacan uga geysto hawlaha hagaajinta kalluumaysiga ee markab liis garaysan;

c) Si uu uga qeybqaato, ama u fududeeyo diyaarinta ka qeyb qaadashada kala wareejinta ama kalluumeysiga wadajirka ah ee "markab liis garaysan"

d) Si loo kireeyo ama qaab kasta oo loola xiriiro si loo kireysto "markab liis garaysan".

3) Qofna ma kontorooli karo, qabanqaabin karo, mana fududeyn karo in qof kale uu koontroolo ama habeeyo ama ka qayb qaato hawlaha soo dhoofinta, soo dejinta ama ka wareejinta rarka nooc kasta markab u liis gareysan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

4) Qofna waa in aanu:

a) Iibin markab liis garaysan ama beddelin sharciga lahaanshahiisa, ama soo iibsanin markab kale iyada oo ujeeddada ugu weyn tahay sii wadidda gacan ku haynta markabka liiska ku jira ama markab cusub oo lagu sii socdo howlaha kaluumeysiga ee sharci darada ah; ama

b) ku shaqeyn markab liis garaysan oo la iibiyey ama haddii kale la beddelay sharciga lahaanshahiisa sida ku cad faqrada 4-aad ee qodobkan xarafka (a).

5) Markab liis gareysan;

a) looma oggolaanayo lagamana diiwaangelinayo Soomaaliya marka laga reebo in markabka la kala iibsaday oo milkiilaha cusub uu keeno macluumaad dhammeystiran oo muujinaya in milkiilahii ama hawlwadeen hore aanu ku lahayn sharciyad, faa'iido ama dan dhaqaale, ama aanu xukumin markabka, iyada oo la tixgelinayo dhammaan dukumiintiyada la keenay, waxaana la go'aaminayaa in markabka la siiyo calankiisa aanay ka dhalan doonin kalluumeysi sharci-darro ah; ama

b) looma fasaxi doono in uu ku soo xirto deked kasta oo Soomaliyeed marka laga reebo in ay dhacdo in markabka, ama dad saaran ay khatar ama dhibaato ku sugan yahiin mooyee, taas oo ujeeddo gaar ah loogu oggolaaday inuu dekedda ku soo xirto iyada oo la baarayo lana fulinayo hawl ay tahay in la fuliyo.

6) Qof kasta oo ka hor yimaada shuruud kasta oo ku xusan faqradaha (2), (3) ama (4) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn shan sano, ama labadaba. Waliba markabka iyo waxa saaran sida qalabkiisa iyo kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada waxaa la wareegaysa Dowladda, markabkaasna lama siin doono ruqsad ama oggolaansho sida uu qabo sharcigan muddo ugu yaraan shan sano ah; diiwaanka maraakiibta Soomaaliyeedna waa laga tiri doona.

Qodobka 43
Mamnuucidda Maraakiib Aan Dalna Ka Diiwaan Gashaneyn

1) Ujeeddooyinka Sharcigan, "**markab aan dalna ka diiwaan gashaneyn**" waa markab loo adeegsado kalluumeysi ama hawlo la xiriira oo aan dal gooni ahi laheyn, balse wata oo ku shaqeysta calamo ilaa labo dal iyo wax ka badan isaga oo isticmaalaya hadba kii la habboonaada,

2) Marka markab kasta oo aan dal ka diiwaan gashaneyn kuna hawlan kalluumeysi ama wax la xiriira meelaha uu ka hawlgalo Urur Goboleedka Maareynta Kaluumeysiga, kaasoo ansixiyey Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamig a ah ee khuseeya kalluumeysiga ama hawlaha la xiriira; markabka noocaas ah waa sharci darro, waana:

a) In laga mamnuuco in uu ka soo dejiyo ama markab kale kalluunka ku wareejin ama wax soo saar kalluun gudaha biyaha Soomaaliya, ama meelaha ka baxsan xeer-xeyndaabka biyaha Soomaaliya isaga oo la xiriiraya markab Soomaaliyeed;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b) In loo diido in uu ku xirto iyo in uu isticmaalo deked kasta oo Soomaaliyeed:
c) Marka laga soo tago faqrada (b), waxaa loo oggolaan karaa in uu biyaha dhex maro oo keliya, marka ay lagama maarmaan u tahay badbaadada iyo caafimaadka shaqaalaha markabka saaran, loomana oggolaan doono wax ka baxsan ujeeddadaas, sida hawlo kale iyo in uu isticmalo deked.
3) Hawlwadeen, qof ka shaqeeya ama qof kasta oo xiriir la leh ama gacan siinaya markab aan dal ka diiwaan gashaneyn oo ku soo xirta, xamuul ku dejiya ama isticmaala deked soomaaliyeed isla markaana jebiya faqrada (2) (a) ama (b) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan, ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba. Iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan, ruqsadda ama oggolaanshaha uu watana waa lagala noqonayaa, kalluunka ama wax kasta oo kalluunka ka yimaada ee uu sidana waa lala wareegi doonaa.

CUTUBKA 4-AAD
SHURUUDAHA GUUD EE KALLUUMEYSI, KALLUUN BEERIS IYO HAWLAHA KALE

Qodobka 44
Sharci U Hoggaansamidda Dadka Haysta Ruqsad, Ogolaansho Ama Fasax Kale

1) Qofka haysta ruqsad, ogolaansho ama fasax kale oo loo siiyay si sharcigan waafaqsan waa in uu:
a. u hoggaansamaa heshiiska iyo shuruudaha ruqsada, oggolaanshaha ama fasaxyada kale;

b. u hoggaansamaa Sharcigan, dhammaan sharciyada kale ee Soomaaliya, heshiis kasta oo caalami ah oo khuseeya, oo ay ku jiraan heshiiska oggolaanshaha kalluumeysiga iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah;

c. ka qeyb gelin howl hoos timaada sharcigan isaga oo aan haysan ruqsad, oggolaansho ama fasaxyo kale.

2) Qof kasta oo ku xadgudba farqadda (1), xarfaha (a) (b) ama (c) wuxuu galay dembi, haddii isla dambigaas aanu sharcigani si kale u xukumin, waxa uu ku muteysanayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad ama xabsi aanay muddadiisu ka badneyn shan sano, ama labadaba, ruqsadana waa la hakin karaa ama lagala noqon karaa.

Qodobka 45
Shuruudaha warbixinada

1) Qof kasta, oo uu ku jiro hawlwadeenka markab kasta, oo looga baahan yahay inuu warbixin u diyaariyo si waafaqsan sharcigan ama waafaqsan hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga, warbixinnada noocaan ahi waa in:
a) ay ahaadaan kuwo run ah, sax ah oo dhinac kasta ka dhammaystiran;

b) uu si sharcigan waafaqsan u diyaariyey qof ama Markab haysta ruqsad ama oggolaansho; ama wakiil la aqoonsan yahay;

c) Loo soo gudbiyay sidii iyo qaabkii loo baahnaa;

d) Lagu soo gudbiyey waqtigii loo baahnaa;

e) Loo gudbiyey qofka ama hay'addii loogu talo galay;

f) La caddeeyay, la xaqiijiyay ama loo sharciyeeyay sidii looga baahnaa.

2) Qofna kama been sheegi karo, iskama allifi karo, ma leexin karo ama ma soo gudbin karo warbixin been ah, aan sax ahayn, marin habawsan ama aan dhan walba ka dhameystirneyn.
3) Qofna dukuminti ahaan uma soo gudbin karo rasiidyada iibka, halkii laga rabey warbixinta kalluunkii uu jillaabtay, sida sharcigani dhigayo.
4) Haddii si sharcigan waafaqsan qiyaas loogu sameynayo caddadka kalluun ee la jillaabtay, qofna ma soo gudbin karo qiyaas haddii aanu adeegsan:
a) nidaam qiyaaseed rasmi ah oo ay Wasaaraddu aqoonsan tahay; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b) Halbeeg caddeyneed Wasaaradda u baahan tahay oo lagu qanco.

5) Qof kasta oo jebiya qodobbada ama farqadda (1) (a), (b), (c), (d), (e) ama (f), (2), (3) ama (4) ee qodobaban waxa uu galay dambi uu ku muteysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn seddex sano; ama labadaba, iyo wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo, waxaana laga joojinayaa ruqsadaha, oggolaanshaha ama fasaxyada kale ee la xiriira.

Qodobka 46

Masuuliyadaha Dawlad Goboleedyada Ka Saaran Maaraynta Kalluun Beerista

Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, marka ay si sharcigan waafaqsan u fulinayaan waajibaadka ka saaran maaraynta, horumarinta iyo ruqsad bixinta kalluun beerista, waa in ay ilaa iyo intii suurtagal ah:

a) hubiyaan in horumarinta kalluun beeristu tahay mid deegaan ahaan waaraysa;

b) Dejiyaan qorshe lagu horumarinayo kalluun beerista.

c) Bixiyaan ruqsadaha ganacsiga kalluun beerista, kuwaas oo ku xiran nadaafadda, kormeerka iyo xaaladaha kale ee ku habboon hawlgalka.

d) Kobciyaan wadashaqeynta hay'adaha dowladda ee maxalliga ah iyo kuwa degmooyinka, oo ay ku jiraan ujeeddooyinka la socodka hawlaha ganacsiga iyo kuwa aan ganacsiga ahayn ee kalluun beerista.

e) Hubiyaan hab-nololeedka, dhaqanka iyo caadooyinka bulshada maxalliga ah iyo goobaha ay ka kallumeystaan aysan waxyeelo ka soo gaarin horumarinta kalluun beerista.

f) ka hortagaan baxsashada, oo ay dejiyaan talaabooyinka la qaadayo haddii baxsi dhaco;

g) Hubiyaan shaqaalaha kalluun beeristu qashinka ka dhasha kalluun beerista aanu waxyeelo ama halis u geysan goobta ruqsada loo siiyay, lana hubiyo in sidii loogu talagalay looga ilaaliyo in uu qashinku bido, biyaha ku milmo ama uu u daadraaco goobo kale.

h) Ka mamnuucaan in kalluun beerista loo isticmaalo daawo ama kiimikooyin kale oo loogu talagalay daweynta cudurrada kalluunka ama dedejinta korriimada kalluunka haddii aan oggolaansho qoraal ah laga helin wasaaradda dowlad Goboleedka ay khusayso iyadoo la tashi la sameyneysa xarunta cilmibaarista ee Wasaaradda Kalluumeysiga ee heer Federaal.

i) Mamnuucaan ku xadgudubka ama burburinta qalabka yaalla goobta kalluun beerista;

j) yeeshaan awood ay ku soo ururiyaan macluumaadka iyo xogta ku saabsan xayaawaanada aan rabbaayadoobin iyo sinjiyada la hidda dooriyay ayada oo ujeeddadu tahay in la daraaseeyo saameynta ay ku yeelanayaan kalluun beerista;

k) La shaqeeyaan Wasaaradda iyo maamul goboleedyada kale ee ay khuseyso, oo ay ku jiraan marka ay howlaha kalluun beeristu xuduud wadaaga saamayn ku yeelanayaan; iyo

l) Qaadaan tallaabooyin iyo ficilo kale oo lagama maarmaan u noqon kara gudashada waajibaadkooda.

Qodobka 47

Bandhigid, wareejin, dhoofin, soo dejin iyo sii deyn kalluun nool

1) Qofna ma qaban karo howlaha soo socda ee la xiriira ganacsi kalluun beeris iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Agaasimaha Guud sida in:

a) La dhigo meel, looga tago ama si kale loo sababo in la dhigo sinji kalluun oo nool meel ka mid ah Biyaha Kalluumeysiga, marka laga reebo haddii:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

I.sinjiyada kalluun ee halkaa la dhigayaa ay intaan lasoo jillaaban ka hor ku jireen biyo kuwa lagu ridayo kala mid ah dhan walba; ama

II.Kalluun beertuhu kalluunka uu baraaktiisa ku shubanayo uu kasoo qaatay kalluun beerte kale oo ay biyaha isku meel ka qaataan;.

b) la keeno ama la sababo in la keeno Dalka ama biyaha kalluumeysi wax sinji kalluun ah;
c) la Kala wareejiyo ukumaha, kalluunka aad u yaryar ama lulumo shisheeye ama sinjiyada hiddahooda la dooriyay ama hidde ahaan wax laga beddelay ama noocyada kalluunka qaan-gaarka ah oo laga qaadayo goob kalluun beeris Dalka ku taalla ee la geynayo meel kale oo Soomaaliya ah;
d) soo-dejinta ama dhoofinta kalluunka nool iyada oo ujeedadu tahay ka ganacsiga kalluun beerista; ama
e) In lagu sii daayo kalluun biyaha kalluumeysiga kalluun aan aheyn midka maxaliga ah ee laga qabtay biyaha Soomaaliya.
2) Qofkii ku xadgudba farqadda (1) carfaha (a), (b), (c), (d) ama (e) wuxuu galay dembi uu ku muteysanayo ganaax lacageed oo aan ka badneyn qadarka ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano ama labadaba.

Qodobka 48
Awood Baaritaan Iyo Qabasho Kalluun Jirran Ama Qaba Cudur Faafa, Kaas Oo Loogu Talagalay Soo-Dejin Ama Dhoofin

1) Agaasimaha Guud wuxuu kormeeri karaa ama amri karaa in la baaro kalluun kasta oo la keeno ka hor ama ka dib marka la soo dajiyo ujeedadana tahay in lagu beero berked kalluumeed, ama uu kormeero ama amro in la baaro kalluun kasta oo lagu soo saaro hawlo kalluun beeris kaas oo loogu talo-galay dhoofin.
2) Agaasimaha Guud wuxuu amri karaa qabashada, heynta, karantiilka, jeermis dilka ama baabi'inta kalluun nool oo la soo dhoofiyay ama la doonayo in la soo dhoofiyo ama la sii dhoofiyo ayada oo ujeedadu tahay in la beerto, wuxuuna tallaabooyinkaas qaadayaa haddii la caddeeyo in kalluunka ama sinjiyada kalluunku jirran yihiin ama cudurrada faafa qabaan.

Qodobka 49
Keydinta Agabka

1) Hawlwadeenka;
a) markab ku sugan biyaha Soomaaliya meel ka mid ah, ama meel kasta iyo goor kasta, oo aan heysan ruqsad ama oggolaansho kalluumeysi ama howlo la xiriira.
b) Markab Soomaaliyeed oo ku sugan goob ka baxsan biyaha Soomaaliya ka taliso, halkaas oo aan si sharcigan waafaqsan loogu idman in uu ka sameeyo kalluumeysi ama howlo la xiriira;
Waa inuu hubiyaa in la xareeyay dhammaan agabka kulluumaysiga ee markabka saaran, laguna xafidaa meel aan si fudud looga soo qaadan karin si loogu kalluumeysto.
2) Hawlwadeenka markab ee ku xadgudba farqadda (1) (a) ama (b) ee qodobkan wuxuu galay dembi uu markii lagu helo uu ku mutaysan doono ganaaxa lacageed ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn saddex sano ama labadaba, iyo wixii kale ee ciqaab ah oo uu sharcigani dhigayo, ruqsada ama oggolaanshaha markab kana waa laga noqonayaa.

Qodobka 50
Shuruudaha Looga Baahan Yahay Muwaadiniin Soomaliyeed Iyo Maraakiibtooda Ee Ku Sugan Meelaha Ka Baxsan Xeer-Xeyndaabka Qaranka

1) Qofna kuma isticmaali karo markab Soomaali leedahay:
a. Meelaha uu ka taliyo waddan kale marka laga reebo inuu raaco sharciyada waddan kaas; ama

b. Inuu ka qeyb qaato howlo ka socda biyaha caalamiga ah ama meelaha ay maamusho Dowlad kale taas oo:

I.aanan waafaqsaneyn heshiis la adeegsan karo; ama

II.wiiqaysa dhaqan galka Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo hawlwadeenada maraakiibta Soomaaliyeed ee ku sugan goobaha ka baxsan talada dalka waa inay u hoggaansamaan:

a. Hannaanka Maareeynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsado; iyo

b. Shuruucda waddamada kale, marka ay ku sugan yihiin meelaha ay ka taliyaan wadamadaasi.

3) Haddiii markab Soomaaliyeed loo isticmaalo howlo ku xadgudbaya shuruudaha ku qoran farqadda (1) ama (2), hawlwadeenka markabkaasi wuxuu galay dembi, wuxuuna muteysanayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn Shan sano, ama labadaba.

4) Haddii muwaadin soomaaliyeed uu ku xadgudbo farqada (2) wuxuu galay dambi uu ku muteysanayo ganaax lacageed oo aan ka badnayn lacagta ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano, ama labadaba.

Qodobka 51
Shuruudaha Xaaladaha Shaqada Ee Shaqalaha saaran maraakiibta qaarkood

1) Hawlwadeenka:

a) Markab Soomaaliyeed oo jooga gudaha ama meel ka baxsan biyaha Soomaaliya:

i. Oo dherekiisu yahay afar iyo labaatan mitir (24m) guud ahaan ama ka badan; ama

ii. Oo dhererkiisu ka yar yahay afar iyo labaatan mitir guud ahaan oo badda ku jiray muddo saddex maalmood ah ama ka badan ama u gudbay meel ka baxsan biyaha Soomaaliya; iyo

b) Markab shisheeye oo haysta ruqsad ansax ah oo la adeegsan karo, oggolaansho ama ruqsad kale loo siiyay howl kasta oo ka mid ah sharcigan,

Waa inay u hogaansamaan dhammaan shuruudaha la dabaqikaro ee ku cad shuruucda Soomaaliyeed, heshiisyada kalluumaysi lagu gaaray iyo kuwa Heerarka caalamiga ah xadidayaan ama shuruudaha Wasaaraddu Dalbanayso ee la xiriira shaqalysiinta ayadoo ogaysiis guud bixinaya, ayadoo ay ku jirto Heerarka Shaqada kalluumaysi ee lagu sheegay Axdiga Caalamiga ah ee Shaqaalaha Aduunka, 2007 (Lr. 188).

2) Shaqsi kasta ee jabiya qodobka ama ku gala dambi wuxuu mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn sida ku cad Jadwalka Labaad ama Xabsi aan ka badnayn 10 sano ama labadaba, waxaana laga joojin karaa Ruqsada iyo oggolaanshiyaha kale, xalaada uu ku dhaco xadgudub keena dhaawac qofeed ama khasaaro nafeed waxaa loo diidikaraa ruqsada iyo oggolaanshaha kale ee ku gudanayo howlo sharcigan gudihiisa, ama inuusan sifa kale uga shaqayn wixii la xiriira kalluumaysiga Soomaaliyeed muddo aan ka yarayn Shan sano laga soo bilaabo waqtiga dhacdada.

Qodobka 52
Mamnuucidda Shakhsiyaad Ka Tirsan Ama Xiriir La Leh Koox Dambiilayaal Caalami Ah Oo Ku Howlan Jabinta Xeyndaabka Sharcigaan

1) Qofna, asagoo xubin ka ah ama xiriir la leh koox dambiilayaal caalami ah, looma oggolaan doono inuu ka shaqeeyo howl ku lug leh sharcigaan, wixii ruqsad, oggolaansho ama fasax kale ah ee la siiyay ayada oo aan laga warqabin ka mid ahaanshihiisa kooxda, waa lagala noqonayaa markii la helo caddeyn macquul ah oo xubinnimadiisa ku saabsan.

2) Qofkii ku xadgudba farqadda (1) wuxu galay dambi uu ku muteysanayo ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad ama muddo xabsi ah oo aan ka badnayn 10 sano, ama labadaba, qofkaasna lama siin doono ruqsad, oggolaansho ama fasax kale oo ku saabsan sharcigan ugu yaraan muddo toban sano ah laga soo billaabo markii sharcigan lagu heshiiyay.

Qodobka 53
Badeecad Ku Kala Wareejin Maraakiib Dekadaha Soomaaliya, Biyaha Soomaaliya Iyo Meelaha Ka Baxsan Biyaha Soomaaliya Ka Taliso

1) Qofna kuma lug yeelan karo, ma taageeri karo lamana xiriiri karo howlo rar kala wareejin ah:

a) Wixii la xiriira markab shisheeye oo ku sugan biyaha Soomaaliya meel aan aheyn dekaddii loogu talagalay howlaha noocaas ah oo uu oggolaaday Wasiirka Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah, marka laga reebo haddii:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

i.Uu Agaasimaha Guud cadeeyo inaan lagu tegi karin dekaddii loo socday muddo macquul ah, iyadoo lagu saleynayo talo bixinta Xafiiska maareeyaha dekedda;

ii.Hawlaha kala wareejinta waxaa kormeeraya sarkaalka kalluumeysiga ee idman ama kor joogaha hadba kii loo baahdo; ama

b) Markuu yahay markab Soomaaliya, oo ku sugan biyaha Soomaaliya; oo uusan joogin dekad loogu talagalay howlaha noocaas ah oo uu oggolaaday Wasiirka Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah, marka laga reebo;

i.In Markabku uu haysto oggolaansho ansax ah oo loo soo saaray si uu rar ugu kala wareejiyo biyaha Soomaaliya ama deked kale si sharcigan waafaqsan;

ii.In uu joogo meel ka baxsan meelaha uu ka taliyo sharciga dalka, iyadoo loo eegayo Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee khuseeya.

2) Qof kasta oo ku xadgudba faqrada (1) (a) ama (b) ee qodobkan waxa uu galay dembi wuxuuna mutaysanayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.

CUTUBKA 5-AAD
SHURUUDAHA OGGOLAANSHAHA KALLUUMEYSIGA

Qodobka 54
Shuruudaha Laga Doonayo Dhammaan Maraakiibta Shisheeye Ee Kalluumeysiga Si Ay U Soo Galaan Una Joogaan Biyaha Soomaaliya

1) Hawlwadeenka markab kalluumeysi ma soo geli karo biyaha Soomaaliya haddii uusan:

a) Markabku haysan ruqsad ansax ah oo ku habboon oo lagu soo saaray Sharcigan; ama

b) Markabku u soo gelin ujeedo ah inuu helo ruqsad, uuna heysto ogolaansho soo gelitaan oo ay bixsay Wasaaraddu.

2) Hawlwadeen markab kalluumaysi oo shisheeye, kaas oo haysta ruqsad ama oggolaansho soo gelitaan ee looga baahan yahay sida ku xusan faqradda (1), iyo maraakiibta kale ee kalluumaysi shisheeye ee wasiirku ku soo saaray bayaan cad, waana inay si toos ah uga soo war geliyaan wasaaradda aaga markabka iyo macluumaadka kale ee ay uga baahan tahay, iyada oo la adeegsanayo Nidaamka Dabagalka Maraakiibta iyo Nidaamka Macluumaadka Tooska ah ama hadba sida loogu baahdo in lagu soo diro aaladda isgaarsiinta tooska ah (e-mail).

a) 24 saac ka hor soo gelitaanka ama ka bixidda biyaha Soomaaliya; iyo

b) si joogta ah markasta oo ay ku sugan yihiin biyaha soomaaliya xiliyada u cayintey Wasaaradda.

3) Hawlwadeenka markab kasta oo shisheeye waa inuu hubiyaa in markabku uusan ka kaluumeysaneynin badda Soomaaliya ama aag kale oo lagu mamnuucay sharcigan ama sharciyada Soomaaliya.

4) Hawlwadeenka markab kalluumeysi oo shisheeye oo ku xadgudba farqadaha (1) (a) ama (b), (2) (a) ama (b) ama (3) ee qodobkan waxa uu galay dembi wuxuuna muteysan doonaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad, iyo in wixii ruqsado ah la hakiyo muddo la'eg intii Wasaaraddu u arakto inay ku habboon tahay laakiin aan ka yarayn hal bil.

Qodobka 55
Oggolaansho Kalluumeysi

1) Iyadoo la tixracayo tilmaamaha sharcigan, lana dabaqayo qorshaha maareynta kalluumeysiga, heshiisyada caalamiga ah iyo sharciyada kale ee caalamiga ah, iyo qorshaha horumarinta qaranka, islamarkaana la txigalinayo tilmaamaha caalamiga ah, ee khuseeya in ay wasaaraddu gali karto heshiisyo u ogolaanayo in maraakiibta shisheeye soo gali karaan biyaha Soomaaliya si ay uga kalluumeystaan.

2) Heshiiska qoraalka ah ee ku xusan farqada (1) ee qodobkan waxa uu noqon karaa qaab heshiis caalami ah, heshiis wada lahaansho ah, heshiis kiro ama heshiis qoran oo lala galay:

a) Dawlad;

b) Ururka isdhexgalka dhaqaalaha gobolka;

c) Urur kalluumeysato ama urur doonley ama hay'ad la mid ah;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Shirkad saamiley ah;

3) Wasaaraddu, kahor inta aysan galin heshiiska oggolaanshaha kalluumeysiga, waa in ay hubisaa in:

a) Qodobbada heshiisku ay waafaqsan yihiin Sharcigan iyo heshiis kasta oo caalami ah iyo heshiiska maareynta kalluumeysiga ama hannaan Soomaaliya qeyb ka tahay;

b) Markab kasta oo qeyb ka ah heshiiska iyo hawlwadeenkiisa, kabtankiisa iyo Milkiilihiisa:

i. Uunu Ku lug lahaanin ama lagu tuhmin ku lug lahaanshaha hawlo kalluumaysi oo sharci-darro ah, meel ka mid biyaha Soomaaliya shantii sano ee ugu danbaysay heshiiska ka hor; iyo

ii. Haddii garsoore maxkamadeed ama maamul ay go'aamiyaan in hawlo kalluumaysi oo sharci-darro ah ay dheceen, waa in loo hoggaansamaa xukunka maxkamada iyo go`aamada ka soo baxa.

c) Kalluumeysiga ama howlaha la xiriira ee markabku aysan ku reebin saameyn xun oo toos ah ama dadban aayaha kheyraadka kalluumeysiga Soomaaliya ama hab-wadanoolaanshaha Badda; iyo

d) Ay jiraan faa'iidooyin cad oo gelitaanka heshiiska u leeyahay Soomaaliya.

4) Wasaaraddu ma geli doonto heshiis, mana fasixi doonto in la adeegsado ruqsad, oggolaansho ama fasax kale oo la bixiyay, ilaa heshiisku uu waafaqsan yahay shuruudaha ku xusan qodobkan mooyaane.

5) Wasaaradda iyadoo tixgelinaysa sharciga waxay go'aan ka qaadanaysaa heshiis kasta oo la xiriira ogolaanshaha gelitaanka;

a) Qiyaas ahaan Qiimaha dhaqaale ee soogelitaanku uu u leeyahay dhinaca kale; iyo

b) Qiimaha khidmadda la gooyay iyo faa'iidoonyinka kale ee loo baahan yahay ay u leeyihiin Soomaaliya, marka laga reebo kaalmada horumarinta ama dheefaha aan la xiriirin qiimaha oggolaanshaha soo gelitaanka.

6) Soo gelitaanka waxaa loo oggolaan karaa oo keliya haddii laga leeyahay ujeeddooyin kalluumeysi ama howlo la xiriira oo laga sameynayo biyaha Soomaaliya ama deked loo asteeyey.

7) Sida ugu habboon, Wasaaraddu waxay la tashanaysaa hay'adaha ay khuseyso ee Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah DFS iyo Daneeyayaasha ay khuseyso arrimaha ku saabsan horumarinta, gunaanadka iyo hirgelinta heshiiska.

8) Lama siin karo ruqsad ama wax oggolaansho kalluumeysi ah ama hawlo la xiriira markab kasta oo shisheeye ilaa fasax ogalaansho kalluumeysi la gudoonsiiyo si waafaqsan sharcigan, oo ay ansax tahay inta uu laalan yahay ruqsada ama oggolaanshaha, taas oo sharcinimadeedu **ku** egtahay xiliga dhamaadka ruqsada, ruqsaduna **waxay** dhacayaa isla waqtigaas.

9) Heshiis kasta oo la xiriira arrimaha kalluumeysiga iyo dhaqaalaha buluugga ah ee ay wasaaraddu la gasho dal ama shirkad shisheeye waa inay Golaha shacabka horkeenaan mudo bil gudaheed ah.

Qodobka 56
Shuruudaha Oggolaanshaha Kalluumaysi

Waxaa intaa dheer, shuruudo ama xaalado kasta oo oggolaansho kaluumeysi ah, kaas oo uu qorayo ama dalbanayo heshiis kasta oo Wasaaraddu gasho waxaa looga baahan doonaa:

a. In dhinaca kale ee heshiiska iyo naaquudaha dhammaan maraakiibta heshiisku khuseeyo ay u hoggaansamaan Sharcigan iyo dhammaan sharciyada kale ee Soomaaliya ee khuseeya;

b. Hawlwadeenka markab kasta oo heshiiskan ku jira waa inuu ruqsad ama fasax ansax ah ka haysata dalka uu markabku ka diiwaan gashan yahay si uu uga sameeyo kalluumeysi ama howlo la xiriira meelo ka baxsan biyaha Soomaaliya;

c. Dhamaan maraakiibta heshiiska ku jirta waa in ay meel wanaagsan kaga jiraan liiska Urur Goboleedka Maareytan Kalluumeysi ama diiwaan lamid ah Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, heshiiskuna si toos ah ayuu u burayaa hadii markabka laga saaro diiwaanka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d. Markab qeyb ka ah heshiiskan oo ku jira liiska maraakiibta sharci darrada ah, oo ay gacanta ku hayso hay'ada maareynta kalluumaysiga Gobolka, heshiiska iyo ruqsada lagu soo saaray toos ayaa loo joojinayaa haddiiba markabku uu ku jiro liis noocaas ah;

e. Dhinaca kale ee heshiiska iyo dhammaan hawlwadeenada maraakiibta heshiiska ku jira waa inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee looga baahan yahay si loo hubiyo u hoggaansanaanta heshiiska iyo Sharcigan;

f. Markab ama hawlwadeen kasta oo aan si buuxda ugu hogaansamin heshiiska, sharcigan ama hannaanka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah waa loo diidayaa cusboonaysiinta ama siinta ruqsada, oggolaanshaha ama fasaxa kale oo hoos yimaada heshiiska oggolaanshaha gelitaanka illaa toban sano;

g. Marka laga hadlayo heshiis lala galay shirkad, urur ama hay'ad oo ay matalayaan xubnaheeda ama dad kale, in shirkadda, ururka ama hay'ada ay mas'uul ka tahay deymaha aan la bixin ee xubnaheeda ama dadka kale ee ka soo baxa wixii hawlgallada ku xusan heshiiska iyo heshiiska laftiisa, oo ay ku jiraan khidmadaha;

h. Ajuurada, canshuuraha iyo khidmadaha kale waa in si buuxda loo bixiyaa waqtiga loo cayimey , heshiiskuna si toos ah ayuu u joogsanayaa haddii aan lacagaha la bixin wakhtigii loogu talagalay ama la daahiyo;

i. Dhinaca kale ee heshiiska lala galay waa in uu bixiyaa faa'iidooyinka heshiiska ugu jira dhaqaalaha iyo muwaadiniinta soomaaliyeed sida maalgashiga, soo iibinta alaabada iyo adeegyada, tababarka, shaqaalaynta muwaadiniinta aqoonta u leh in ay noqdaan shaqaale markab iyo faa'iidooyin kale ee Wasaaraddu tilmaantey;

j. Marka muddada heshiisku ka badan tahay hal sano, heshiiska waxaa lagu saleynayaa in sannadkiiba mar dib-u-eegis lagu sameeyo, joojintiisa iyo hakintiisana waxaa la waafajinaya sida uu qabo qodobka 61aad; iyo

k. Siyaabaha iyo shuruudaha ugu yar ee la xiriira oggolaanshaha kalluumaysiga ee ku habboon waa in lagu daraa heshiiska maaraynta kalluumeysiga.

Qodobka 57
Shuruudaha Wada Lahaansho Iyo Heshiisyo Kiro

1) Dhaqan gal ma noqon karo heshiis Wada lahaansho ama kireyn Markab shisheeye oo biyaha Soomaaliya ama meel ka baxsan ka samayn kara kalluumeysi ama hawlo la xariira, iyadoo aan ogolaansho laga haysan Wasaaradda.

2) Heshiis Wada lahaansho ama heshiis kiro waxaa la oggolaanayaa ama la aqoonsan karaa marka shuruudaha soo socda si dhammeystiran loo buuxiyo:

a) heshiiska Wada lahaansho ama kirada marka uu keenayo faa'iidooyin muuqda oo aan saameyn taban ku yeelanayn kalluumeysiga, ama bii'ada baddeeda, sida;

i. Horumarinta warshadaha kalluumeysiga Dalka;
ii. Tababarka muwaadiniinta;
iii. Dakhliga ka yimaada sarrifka lacagaha qalaad;
iv. Maalgashiga Dalka;
v. Howlaha soo dejinta iyo gaarsiinta gudaha; iyo
vi. Horumarinta howlaha dhoofinta;

b) Aasaasid shirkad milkiyaddeeda, maamulkeeda iyo saamigeedaba ay leeyihiin muwaadiniin soomaaliyeed si waafaqsan sharciga Dalka,

c) Heshiiska Wada lahaanshaha ama heshiiska kirada ee lagu ansixiyay sharcigan waa in;

i. Laga diiwaangaliyo Dalka;

ii. Uu u hoggaansamo dhammaan sharciyada Dalka;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Iyadoo sharciga lagu salaynayo waa in la soo gudbiyaa dhammaan shuruudaha maaliyadeed ee laga doonayo markab shisheeye, oo ay ku jiraan bixinta dhammaan canshuuraha, khidmadaha, ganaaxa ama go'aan kale oo ka dhalan kara howlaha markabka; iyo

e) Marka uu heshiisku kiro ku saabsan yahay, uuna markabku ku sugan yahay meel ka baxsan biyaha Soomaaliya, dalka uu markabku calankiisa sito ayaa mas'uul ka ah in uu si buuxda ula socdo oo koontaroolo markabka.

3) Markab kasta oo kalluumaysanaya sida ku xusan heshiiska wada lahaanshaha ama kirada ee la ansixiyey waa inuu ku dhaqmaa dhammaan shuruudaha sharcigan ee la xiriira maraakiibta shisheeye.

Qodobka 58
Kireynta Maraakiib Si Waafaqsan Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah

1) Ujeeddada Qodobkan,

a) "Kireyn maraakiib" waxaa loola jeedaa heshiis ama qorshe uu dhinac xubin ka ah Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, markab calankiisa wata uga kireynayo dhinaca kale oo aan ka mid aheyn ururka, markaas oo heshiiska lagula galayo wakhti cayiman, heshiiska waxaa galaya mulkiilaha markabka ama wakiilkiisa iyaga oo aan calanka beddelin.

b) "xubin kireyste" waxaa loola jeedaa xubin ka tirsan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, taas oo haysata qoondo ama fursado kalluumeysi; iyo

c) "Dalka Calanka leh" waxaa loola jeedaa dalaka uu ka diiwaan gashan tahay markabka la kireystay.

2) Maraakiib kasta oo la kireysto waa in ay u hoggaansamaan qodobbada Sharcigan iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah.

3) Heshiiska kireynta waa inay ku jiraan shuruudaha soo socda, marka lagu daro shuruudaha kale ee looga baahdo sharcigan:

a) Dalka calanka leh waa in ay qoraal ku oggolaato heshiiska Kireynta;

b) Muddada hawlaha kalluumeysiga ee ku xusan heshiiska kireynta markabka wadar ahaan waa inaysan ka badnaan 12 bilood;

c) Maraakiibta la kireeyo waa in laga diiwaangeliyaa xubnaha mas'uulka ka ah iyo kuwa ay wada shaqeeyaan ee aan xubnaha ka aheyn Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, kuwaas oo:

I. Si cad u oggolaaday in lagu dabaqo hanaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, languna fuliyo maraakiibtooda; iyo

II. Si wax ku ool ah u gutay waajibaadkooda si ay u xakameeyaan maraakiibtooda una hubiyaan u hoggaansanaanta hanaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah;

d) Maraakiibta la kireeyey waxa lagu daraayaa diiwaanka maraakiibta ogolaanshaha heysta ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

e) Iyada oo aan wax loo dhimeyn waajibaadka xubinta kireystaha markabka, dalka calanka waa inay hubisaa in markabka la kireystay u hoggaansamay xubinta kireystaha iyo dalka calanka labadaba ama kuwa ay wada shaqeeyaan ee aan xubnaha ka aheyn Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

f) Marka xubinta kireystuhu oggolaado markabka la kiraystay inuu ka kalluumeysto biyaha caalamiga ah, dalka calanka ayaa mas'uul ka ah la socodka kalluumeysiga ka dhacaya biyaha caalamiga ah sida ku cad heshiiska kirada, markabka la kiraystayna waa inuu warbixinta Hannaanka Dabagalka Markabka iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

xogta kalluunka la qabtay u soo diraa xubinta kireeystaha, dalka calanka labadaba, iyo Xoghaynta Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga;

g) Dhammaan kalluunka la qabto (hore loo qabtay ama la qaban doono), oo ay ku jiraan kalluunka aan loo qasdin iyo kuwa la tuuro, sida uu qabo heshiiska kireynta markabka, iyo sidoo kale warbixinta kormeeraha waxaa lagu xisaabinayaa saamiga ama fursadaha kalluumeysiga ee xubinta kireystaha;

h) Xubinta kireystaha waa inuu warbixinta dhammaan kalluunka la qabtay oo ay ku jiraan kalluunka aan loo qasdin iyo kuwa la tuuraba ee laga qabtay Biyaha Soomaaliya iyo warbixinada kale u gudbiyaa Xoghaynta Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, isagoo u marinaya warbixinta habka adeegsiga Mobilka, Sida uu qabo Qorsha Wargelineed ee Heshiiska, ee uu ansixiyey Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

i) Hannaanka dabagalka maraakiibta iyo, aaladaha loogu talagalay kala soocida goobaha kalluumeysiga, sida sumad ama calaamad kalluun waa in loo isticmaalaa maareynta kalluumeysiga si wax ku ool ah iyadoo la raacayo Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

j) Dhammaan maraakiibta la kireystay waa in ay maraan kormeer ugu yaraan 5% awoodda kalluumeysiga ay isticmaaleen, iyada oo lagu cabbirayo sida ku haboon Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga.

k) Dhammaan maraakiibta la kireystay waa in ay haystaan ruqsad kalluumeysi oo uu soo saaray kireystuhu, maraakiibtaasi waa in aysan ku jirin liiska maraakiibta ku diiwaangashan kuwa sharci daro ku kalluumeysta oo ku jira liiska Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga.

l) Marka lagu howlgalayo heshiisyada kireynta, maraakiibta la kireystay ilaa intii suurtagal ah waa inaan loo ogolaaan inay isticmaalaan qoondada dalka calanka ama kuwa ay wada shaqeeyaan ee aan xubnaha ka aheyn

m) Markab kireysan looma oggola inuu ku kalluumeysto wax ka badan hal heshiis kireysi isku mar

n) Haddii si gaar ah loogu cadeyn heshiiska kireynta, isla markaana waafaqsan sharciga iyo qanuunka dalka, kalluunka uu soo dabto markab kireysan waxaa si gaar ah looga soo dejinayaa dekedaha kireestaha ama si toos ah ula socdo si loo hubiyo in howlaha maraakiibta la kireystay aysan wax u dhimeyn Hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah;

o) Markabka kireysan waxaa marwalba looga baahan yahay inuu sito nuqul ka mid ah dukumiintiyada soo socda:

i. Magaca (xarfaha alifbeetada dalka iyo kuwa Latinka ah) iyo diiwaangelinta markabka la kiraystay, iyo lambarka aqoonsiga markabka ee Hay'adda Caalamiga ee Badaha (IMO) (haddii ay macquul tahay)

ii. Magaca iyo cinwaanka la gala xiriirayo milkiilaha/milkiilayaasha markabka;

iii. Faahfaahinta markabka, oo ay ku jirto dhererkiisa guud ahaan, nooca markabka iyo nooca kaluumeysiga ee loo adeegsan doono heshiiska;

iv. Nuqul ka mid ah heshiiska kireynta iyo ruqsad kasta ama ruqsad kalluumeysi oo la siisay markabka, oo ay ku jiraan gaar ahaan saamiga qoondada, ama suurtagalnimada kalluumeysiga ee loo qoondeeyey markabka; iyo muddada heshiiska;

v. ogolaanshaha heshiiska markabka; iyo

vi. Tallaabooyinka la qaaday si loo hirgeliyo qodobadan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

4) kireynta markab ama heshiiska kireysiga maraakiibta ee aan u hoggaansamin faqradaha (2) ama (3) waxaa laga soo qaadayaa in aanay heysan sharciyad sax ah ama waxba kama jiraan.

Qodobka 59

Dib-U-Eegis Ogolaansho Kalluumeysi

1) Marka qodobbada heshiiska ogolaanshiyaha uu ka badan yahay hal sano, Wasaaraddu waxay dib u eegis ku sameynaya heshiiska saanad kasta si loo qiimeeyo u hoggaansanaanta shuruudaha iyo xaaladaha heshiiska oo ay ka mid yihiin;

a) u hogaansanaanta cidda heshiiska lala galay shuruucda Soomaaliya iyo qodobada heshiiska;

b) Faa'iidooyinka ay heshiiska ka heshay Soomaaliya sanadkii tegay;

c) qiimaha lagu qiyaasay fursadaha kalluumeysiga ee socda ee heshiiska ku jira; iyo

d) Arrimaha kale ee uu jideeyo ama uu dalbado wasaaraddu si waafaqsan Xeerkan.

2) Ka dib markay aragto ciidda heshiiska lala galay aysan ka soo bixin sharuudihii heshiiska lagula galay una hogaansamin sharcigan waxay tirtireysaa ama hakinaysaa dhammaan heshiiskii la Wasaaraddu waxay siinaysaa ogeysiis loo qaateen ah tirtiridda ama hakinta dhinaca kale si loo xaqiijiyo joojinta ama tirtiradda kalluumeysiga iyo dhaqdhaqaaqyada kale ee la xiriira.

3) Wasaaraddu waxay joojinaysaa ama haddii kale waxay xaddideysaa heshiis:

a) ka dib soo jeedinta Agaasimaha Guud in sii socoshada kalluumeysiga ay khatar ku tahay sii jiritaanka kaydka kalluunka taxaddar ahaan;

b) Sababo kale oo lagu qeexi karo sharcigan.

4) Hakinta heshiiska sida ku xusan farqadaha (2) ama (3) waxay noqon kartaa waqti cayiman ama ilaa shuruudaha laga buuxiyo, maadaama uu u baahan karo Wasiirku kuna saleyn karo soo jeedinta Agaasimaha Guud;

5) Marka heshiis la hakiyo ama lagu xaddido faqrada (3) xaraf (a) ee qodobkan, Wasiirku marka tixgeliyo soojeedinta Agaasimaha Guud; waxa uu go'aamin karaa dib-u-celinta qayb ka mid ah lacagihii khidmada si raata-raato ah, fursadaha kalluumeysiga ee la hakiyay awgeed.

Qodobka 60

Heshiiska Maareynta kalluumeysiga

Soo jeedinta Agaasimaha guud kadib, Wasiirku waxa uu heshiis maareyn kalluumaysi la gali karaa dawlado, ururada Gobolka ama ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn iyada oo ay ujeeddadu tahay iskaashiga ama iskuduwidda arrimaha maaraynta kalluumaysiga ama arrimaha la xiriira ee ku xusan Xeerkan.

Qodobka 61

Wakiilada

1) Hawlwadeenka markab kalluumeysi oo shisheeye oo soo codsada ruqsad si waafaqsan sharcigan waa in uu soo magacawdaa shirkad ama qof wakiil uga noqda Soomaaliya oo loo oggol yahay inuu u matalo markabkaas adeegga geedi socodka iyo ogeysiis kasta oo loo baahan yahay in la siiyo Markabka iyo keenidda macluumaadka loo baahan yahay sida ku xusan Xeerkan ayada oo loo eegayo markabka iyo howlahiisa, naaaquudaha, kabtanka iyo xubnaha shaqaalaha.

2) Qof shirkad ka socda kaliya ayaa noqon kara wakiil iyadoo la raacayo sharciyada Soomaaliya iyadoo macluumaadkiisa oo buuxa loo dirayo Agaasimaha Guud; kuwaas oo ka mid yihiin arrimaha soo socda:

a) Waddada iyo cinwaanka rasmiga ah ee xafiiska guud ee shirkadda iyo xaruntа ganacsiga ay ku leeyihiin Soomaaliya;

b) magaca hadda jira iyo magac kasta oo hore, cinwaanka waddada, taleefanka tooska ah, iimaylka iyo shaqada qofka loo idmay inuu maamulo shirkadda ee Soomaaliya;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Liiska Agaasimayaasha Guud ee shirkadda, faahfaahinno la xiriira Agaasimayaasha Guud sida ay ugu qoran yihin diiwaanka shirkadda; iyo

d) Magacyada iyo cinwaanada waddada, taleefanka tooska ah iyo iimaylka ee qof ama in ka badan oo si joogto ah u deggan Soomaaliya isla markaana ay waajib ku tahay inay bixiyaan canshuurta ay Soomaaliya ku aqbashay wakiilnamada adeegga shirkadda iyo ogeysiis kasta oo looga baahan yahay adeegga shirkadda iyo inuu bixiyo macluumaadka kale ee uu uga baahan karo sharcigaan marka loo eego markabka iyo howlihiisa, hawlwadeenka, maamulka iyo xubnaha shaqaalaha;

e) lambarka diiwaangelinta shirkada iyo Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha Soomaaliya, iyo haddii ay dhacdo in wax laga beddelo cinwaanka ama Agaasimayaasha Guud, maareeyayaasha, magacyada, cinwaanada, telefoonka tooska ah iyo cinwaanka iimaylka ee dadka noocaas ah, shirkaddu waa inay si dhakhso leh ugu gudbisaa Agaasimaha Guud ogeysiis isbeddel oo qoraal ah.

3) qof kasta oo loo xilsaaray iyada oo la raacayo qodob hoosaadka (1), qof kasta oo loo xilsaaray iyadoo la raacaayo qodob hoosaadka (2) (d) iyo, marka la eego cutubyada (c) illaa (i) shirkad kasta oo loo xilsaaray iyadoo la raacayo farqada (2) waa inuu:

a) inuu Soomaaliya si rasmi ah ugu nool yahay.

b) masuul ka yahay canshuuraha dakhliga ka soo gala Soomaaliya oo ay soo gudbiyaan Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha;

c) uusan horey xukun maxkamadeed ugu dhicin;

d) aanu laheyn wax diiwaan ah oo xiriir la leh howlo kalluumeysi oo sharci-darro ah oo ka dhaca gudaha ama banaankan aagagga ay maamusho dawladda Soomaaliya;

e) u fuliyo waajibaadka sida loo baahan yahay iyadoo la raacayo sharciyada khuseeya ee ku habboon dalka ee la xiriira wakiillada iyo, sida ugu habboon, shirkadaha;

f) Bixiyaa macluumaadka kale ee loo baahan karo iyadoo la raacayo qodobbada xeerkan ee khuseeya markabka shisheeye;

g) ku shaqeeyo, una hoggaansamo nidaamka sharciga ah marka loo eego markabka iyo howlihiisa, hawl wadeenka, maamulka iyo xubnaha shaqaalaha;

h) qaado mas'uuliyadda ficillada markabka oo buuxa sida ku xusan Sharcigan;

i) u hoggaansan dhammaan sharciyada Soomaaliya;

j) aanu dhaafin/aysan dhaafin Wasaaraddiisa ka wakiil ahaan, oo ay ka mid tahay macaamilka iyo wajibbaadkiisa; ama

k) In aanu ku lug yeelan howl kasta oo keeni karta ama uu ka dhalan karo khilaaf daneed sida ku xusan Xeerkan.

4) Wakiil kasta oo loo xilsaaray sida ku cad farqada (1) iyo shirkad kasta oo loo aasaasay sida ku cad farqada (2) ma lahaanayaan sharciyad wakiilnimo ama matalaad la xiriirta markab kasta oo ajnabi ah ilaa uu soo codsado lana siiyo aqoonsi ansax ah ee ay bixisay Wasaaraddu.

5) Hawlwadeenka markab kasta oo ajnabi ah waa inuu hubiyaa wakiilkiisa la aqoonsan yahay in uu:

a) Waa inuu ka haystaa sharciyad buuxda Wasaaradda, isla markaana Wasaaradda soo wargaliyo si uu u fuliyo howlihiisa si markastana helo ogeysiiyada si waafaqsan Xeerkan oo ay ku jiraan shuruudaha ku xusan farqada (3); iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b) U hoggaansan yahay dhammaan shuruudaha ku xusan farqada (3).

6) Ruqsad lama siinayo markab ajnabi ah ilaa loo xilsaaro wakiil, kaas oo haysta aqoonsi ansax ah si waafaqsan Xeerkan uuna buuxiyo dhammaan shuruudaha qodobkan;

7) Marka ay jirto caddeyn waafi ah oo ku saabsan ku xad gudubka qodobbada (1), (2) ama (3), aqoonsiga wakiilka waa la hakin doonaa ama waa lagala noqon doonaa, ogeysiisna waa in la siiyaa hawlwadeenka markabka ajnabiga ah, wakiilkana hakinta iyo ka noqoshadaba waa lagu wargalinayaa.

8) Marka ogeysiiska kala noqoshada aqoonsiga la siiyo sida ku cad farqada (7), wakiilka noocan ah ama shirkadaas waxaa si joogto ah looga mamnuucayaa inay matalaan ama wakiil u noqdaan markab shisheeye kaluumeysiga ama howlo la xiriira gudaha Soomaaliya.

9) Hawl wadeenka markab shisheeye waa in uu magacaabo wakiil cusub muddada cayiman ee ku xusan ogeysiiska la siiyay sida ku xusan farqada (7), ilaa inta magacaabidaas la sameynayo, hawlwadeenku wuxuu si toos ah mas'uul uga noqonayaa inuu la xiriiro dowladda una hoggaansamo shuruudaha hoos yimaada Xeerkan iyo shuruucda kale ee Dalka.

10) Qofka ka hor yimaada shuruud kasta oo lagu qeexay qodob hoosaadyada (1), (2), (3) ama (9) wuxuu galayaa dambi wuxuuna mutaysanayaa ciqaab ganaax ah oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sharaxay Jadwalka Koowaad ama muddo xabsi aan ka badnayn shan sano ama labadaba.

11) Qof naftiisa u matalaya wakiil ama u haya hawlo la xiriira markab shisheeye wakiil ahaan isagoo aan haysan aqoonsi ansax ah sida ku cad qodob hoosaadka (4) wuxuu galayaa dambi, waxa uuna mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sharraxay Jadwalka Koowaad ama muddo xarig ah oo aan ka badnayn shan sano ama labadaba, waxaana si joogto ah looga mamnuucayaa helitaanka aqoonsi wakiilnimo gudaha Soomaaliya oo la xiriira markab shisheeye.

12) Marka hawlwadeen kasta uusan u hogaansamin farqada (5), wuxuu galayaa dambi wuxuuna mudan doonaa ciqaab ganaax ah oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sharaxay Jadwalka Koowaad iyo weliba:

a) Ruqsada waa laga hakinayaa muddada uu Agaasimaha Guud u arko taasoo aan ka yarayn hal bil; ama

b) Ruqsada waa lagala noqon karaa;

Hawlwadeenka noocan ahi waa inuu si buuxda u soo bandhigaa macluumaadka ku saabsan heshiiska u dhexeeya hawlwadeenka iyo wakiilka marka lagu daro wixii kale oo looga baahan yahay sharcigan.

Qodobka 62
Mudnaanta Wax Soo Saarka Soomaaliya

1) Qofka Hayste shati, ruqsad ama fasax kale oo loo soo saaray ujeedada ogolaansho kalluumaysi iyada oo la raacayo Qaybtan waa inuu mudnaanta siiyaa:

a) agabyada iyo alaabooyinka lagu sameeyo Dalka;

b) hay'adaha adeegga ay leeyihiin

I.muwaadiniin somaliyeed;

II.shirkado ama iskaashiyo ka mid ah ama ka diiwaangashan Soomaaliya; iyo

III.shirkadaha dadweynaha

2) Dib u eegis kasta oo ku saabsan waxqabadka dadka ruqsada haysta ee lagu qeexay Qeybtan waxaa laga eegayaa heerka doorbididda ee la siiyay agabka, badeecadaha iyo adeegga hay'adaha Soomaaliyeed, qiimeyntana waxaa la tixgelinayaa marka laga tala bixinayo dib usoo-saarista ama cusboonaysiinta ruqsada.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 63
Damaanad Qaadis

1) Wasiirku wuxuu soo saari karaa shuruudo hor dhac ah, oo la xiriira bixinta ruqsada markab kasta oo ajnabi ah, ama wakhti kasta inta lagu jiro muddada ruqsad bixinta, in codsaduhu ama qofka ruqsada la siiyey uu bixiyo damaanad si waafaqsan habraacyada noocan oo kale ah ama qaabka uu u qeexo Wasiirku, isagoo la tashanaya Xeer Ilaaliyaha Guud, iyadoo la tixgelinayo:

a. heerka u hoggaansamida markabka, hawlwadeenkiisa iyo sida ugu habboon ee la xidhiidha maraakiibta oo leh shuruudaha dalka Calanka, Waddamada kale ee xeebta leh, ururrada maaraynta kalluumaysiga ee gobolka iyo sharciga caalamiga ah;

b. khatar kasta oo ka dhalan karta u hogaansanaan la'aanta sharcigan ama shuruucda kale ee Soomaaliya; iyo / ama

c. Shuruudo kale oo uu cadeeyay Wasiirka.

2) Damaanadda ku xusan faqradda (1) waxay u adeegi doontaa sidii damaanad qaad lacageed oo loogu talagalay fulinta dhammaan waajibaadka ka soo baxa ruqsada iyo sharcigan, oo ay ku jiraan kharashaadka suurtagalka ah ee la xiriira samatabbixinta, soo kabista kharashaadka kale iyo ganaaxyada, ama magdhawga xadgudubyada ka dhanka ah xeerkan, laguna soo saari doono sida uu dhigayo Xeerkan.

3) Qadarka damaanad qaadka lacageed ee ku xusan qodobkan waxaa go'aaminaya Wasiirka kadib soo jeedinta Agaasimaha Guud iyo iyadoo la tixgelinayo qorshe kasta oo ku haboon maareynta kalluumeysiga, qiimaha kalluumeysiga la xiriira iyo xaddiga ganaaxa ugu badan sida ku xusan Sharcigan, oo ku saabsan wixii dambi ah ee dhici kara iyo khatarta lagu xusay faqradda (1).

4) Foomamka damaanad qaadka lacageed ee la aqbali karo sida ku xusan qaybtaan waxay noqon karaan mid uun ama wadarta kuwa soo socda:

a) Dammaanad qaad;
b) Warqadda Deynta (LC);
c) Aaminaad Lacageed oo leh xilli lacag-bixin;
d) Siyaasadda Caymiska;
e) Lacag dhigasho;
f) Sanadle.

5) Halka qofka heesta shatiga ay waajib ku tahay inuu bixiyo dammaanad-qaad lacageed sida ku cad qaybtan oo hadii uu ku guul-darraysto inuu sidaas sameeyo muddada loo baahan yahay, ruqsad lama siin doono, ama haddii la siiyeyna waa lagala noqonayaa doonaa.

6) Shuruudo dheeri ah iyo habraacyo soo saarid iyo sawir ku saabsan dammaanada waxqabadka ayaa la qori karaa.

CUTUBKA 6-AAD
Macluumaad, Xog Iyo Tirakoob
Qodobka 64
Aasaasidda Nidaam Xog-Ururin

1) Waa in Wasaaraddu hirgalisaa nidaam dhexe oo ilaalinaya xog ururinta iyo tirakoobka oo leh ujeedooyinka soo socda;

a) kor u qaadista xog ururinta lagama maarmaanka u ah dhowrista, maareynta iyo isticmaalka joogtada ah ee kheyraadka kalluumeysiga;

b) bixinta isku-xirnaanta heerarka kala duwan ee dowlada, bulshooyinka dagan xeebaha iyo iskaashatooyinka kaluumeysiga;

c) sameynta hab gorfeyn iyo saadaalin loogu talagalay qiimeynta keydka kalluunka iyadoo lala tashanayo wasaaradaha kalluumeysiga maamul goboleedyada;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) buuxinta shuruudaha heer qaran, gobolka iyo caalami ee la xiriira macluumaadka, xog ururinta iyo isdhaafsiga; iyo

e) taageerida ujeeddooyinka iyo mabaadi'da Xeerkan.

2) Nidaamka macluumaadka, ama waxyaabaha uu ka kooban yahay ee uu cayimi karo Agaasimaha Guud, waxaa laga heli karaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda iyada oo la ilaalinayo dhawrsanaanta xuquuqda macluumaadka oo lagu go'aaminayo sida waafaqsan Xeerkan, iyadoo la tixgelinayo hababka caalamiga ah ee ugu wanaagsan ee daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka.

3) Nidaamka macluumaadka waa inuu ku jiraa macluumaad taageeraya hirgalinta sharcigan iyo tallaabooyinka ilaalinta iyo maaraynta caalamiga ah, oo ay ku jiraan macluumaadka sida Agaasimaha Guud u baahan karo ee la xiriira maareynta kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira, kormeerka, xakamaynta iyo ilaalinta, arrimaha sharciga iyo maamulka, dhinacyada tirakoobka iyo dhaqaalaha iyo macluumaad kale oo la jaan qaadaya ujeeddada iyo mabaadi'da Xeerkan.

4) Agaasimaha Guud wuxuu hubinayaa in, sida ku habboon, macluumaadka laga baahiyo keydka macluumaadka lana gaarsiiyo hay'adaha kale ee qaranka, maamulada, ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah waqtiga loogu talagalay si loo hubiyo gudashada waajibaadka qaran, gobol iyo caalami ee Soomaaliya, oo ay ka mid tahay dawladda calanka bixisay iyo mid xubin ka mid ah urur kasta oo la xiriira maamulka kalluumeysiga gobolka.

Qodobka 65
Macluumaad Loo Baahan Karo, Lana Baari Karo

1) Qof kasta oo gudanaya hawlo sida uu qabo sharcigani; waa inuu hayaa oo ilaaliyaa diiwaanadaas iyo macluumaadkaas una soo gudbiyaa Wasaaradda qaabka uu ugu baahdo Wasiirku ama sida looga baahdo iyadoo la raacayo sharcigan, sharciyada kale ee Soomaaliya ama Hannaanka Ilaalinta iyo Maareynta Caalamiga ah ee ay khuseyso ama heshiis caalami ah.

2) Agaasimaha Guud waa inuu hubiyaa soo uruurinta iyo gorfeynta xogta tirakoobka iyo macluumaadka kale ee laxiriira shaqada iyo dadka ku hawlan sida ku cad sharcigaan; iyo u gudbinta xogta iyo macluumaadka hay'adda ay khuseyso ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga sida ay uu u baahan karo Hannaanka Ilaalinta iyo Maareynta Caalamiga ah ee ay khuseyso.

3) Agaasimaha Guud; ayada oo ay ujeeddadu tahay hubinta xisaabaadka, diiwaannada, dukumiintiyada iyo macluumaadka kale ee loo baahan yahay in la xafido, la baahiyo ee la xiriira farqada (1) wuxuu agaasimi karaa:

a) Xisaabinta ama kormeerka koonto kasta, diiwaanada, dukumiintiyada, xogta iyo macluumaad kale ama meesha macluumaadkaas oo kale lagu keydin karo;

b) xisaabinta ama kormeerka markab kasta, warshad wax soo saar ama xarun kale oo sharcigani khuseeyo; iyo

c) in qof kastaa bixiyo macluumaad dheeri ah oo laxiriira koonto kasta, diiwaanada, dukumiintiyada, xogta iyo macluumaadka kale ee la hayo, la baahiya ama lagu wargaliyay sida ku cad sharcigaan iyadoo la raacayo waqtiga loo xaddiday ama ee loo cayimay.

4) Qof kasta oo:

a) ku guuldareysta inuu hayo, keeno ama la xiriiro wixii xisaab ah, diiwaanno, dukumiintiyo, xog iyo macluumaad kale ah sida looga baahan yahay farqada (1); ama

b) aan fududeyn, kaalmayn ama u hoggaansamin shuruudaha hanti dhowrka ama kormeerka lagu sameeyay faqrada (3),

wuxuu galayaa dambi marka lagu helo kadibna wuxuu mutaysanayaa ganaax lacageed oo lagu soo saaray Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn seddex sano, ama labadaba, intaas waxaa sii dheer ruqsadda la adeegsan karo, oggolaanshaha ama diiwaangelinta waa lagala noqon karaa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 66
Macluumaad Run ah, Dhammaystiran Oo Sax ah, Ayna Reeban tahay in la Baabi'yo

1) Dhammaan shakhsiyaadka waa inay xaqidaan oo ay gudbiyaan macluumaadka, xogta iyo tirakoobka sida looga baahan yahay iyadoo la raacayo Sharcigan; diiwaanadaas, macluumaadkaas, xogta iyo tirakoobyadu marwalba waa inay noqdaan kuwo run ah, dhameystiran oo sax ah oo aan noqon doonin been, marin habaabin ama aan sax ahayn.

2) Qofna ma beddeli karo, baabi'in karo, tirtiri karo ama burburin karo:

a) cadeyn, shahaado, ama dukumiintiyo kale, macluumaad, xog ama tirakoob la sameeyay ama loo baahan yahay in lagu sameeyo ama lagu soo saaro iyada oo la raacayo Xeerkan;

b) ku suntan sharcigan; ama

c) calaamadaha loo baahan yahay ee ku qoran maraakiibta ama agabka.

3) Qofna uma soo gudbin karo Wasaaradda, wasiirka ama qof kasta, maxkamad, hay'ad ama wasaarad dawladeed oo ka jirta Soomaaliya ama maamul goboleed kale ama hay'ada khuseeysa maamulka kalluumeysiga, hay'ad caalami ah ama hay'ad kale ama qof kale wax macluumaad ah ama dukumiinti khiyaano ah ama marka ay tahay macluumaad qoran ama dukumiinti, been abuur ah.

4) Shuruudaha qaybtani waxa ay khuseeyaan diiwaanada, macluumaadka, xogaha iyo tirakoobyada oo sharcigan ku cad; iyada oo aan loo eegin haddii loo gudbinayo Wasaaradda iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ama hay'ad ama qof kale.

5) qof kasta oo aan u hoggaansamin wax kasta oo looga baahan yahay faqrada (1), (2) ama (3) wuxuu galayaa dambi marka xukun lagu ridana wuxuu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo hoos timaada xeerkan.

Qodobka 67
Isdhaafsiga Xogaha Laba-Geesood Ahaan, Gobol Ahaan, Caalami Ahaan

Agaasimaha Guud wuxuu la wadaagi karaa macluumaadka hoos yimaada sharcigan hay'ad kasta oo caalami ah ama goboleed oo ay Soomaaliya xubin ka tahay ama waafaqsan heshiis caalami ah, iyadoo la tixgelinay

o wixii shuruudo ah ee xog qarin ah, waana inuu sidaa sameeyaa marka loo baahdo heshiiska caalamiga ah ama Urur Goboleedka Maaraynta Kalluumeysiga.

Qodobka 68
Macluumaad Qarsoodi Ah

1) Ujeeddooyinka Sharcigan, "macluumaadka qarsoodiga ah" waxaa loola jeedaa:

a) macluumaadka Wasiirku uu caddeeyo in ay yihiin qarsoodi;

b) macluumaadka hoos taga faqrada soo socota (3); iyo

c) macluumaadka ku xusan faqrada soo socota (5)

2) Qofka gudanaya waajibaadka ama mas`uuliyadaha ku xusan Sharcigan, oo ay ku jiraan Wasiirka iyo Agaasimaha Guud, ilaa sharcigan u oglaado mooyee ama iyadoo la raacayo siyaasada iyo habraacyada nidaamka xog qarsoonida Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee ay khuseyso, ma muujin karo macluumaad qarsoodi ah oo ay ku kasbadeen waajibaadka iyo mas'uuliyada saaran.

3) Wasiirka waxaa laga yabaa inuu qoraal ogeysiis ah:

a) ku cadeeyoo macluumaad kasta inay yihiin macluumaad qarsoodi ah; iyo

b) ku cadeeyo in soo koobitaanka guud ee macluumaadkaas aysan ahayn macluumaad qarsoodi ah.

4) Wasiirka wuxuu qoraal ugu oggolaan karaa qof kasta inuu:

a) helo ama isticmaalo macluumaad qarsoodi ah;

b) gali karo goobaha ay yaalaan macluumaad sir ah asaga ama ayada oo loo magacaabi karo ama xaddidi karo gelitaanka goobahaas oo kale.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

5) Macluumaadka soo socdaa waa inay ahaadaan mid sir ah, ka hor inta aan Faafinta Rasmiga ah lagu soo saarin:

A) macluumaad kasta ama xog ganacsi kasta ee lagu gudbiyay diiwaan, ama dukumiintiyada kale ee loo baahan yahay in la kaydiyo, la bixiyo ama loo wadaago si waafaqsan sharcigan;

B) wixii macluumaad ah ama xog kale ah oo ay soo gudbiyaan Aaladda Dhaqdhaqaaq Tebinta sida ku cad sharcigan; iyo

C) Xog aan tifaftirneyn oo laga helay baaris cilmiyeed.

6) Macluumaadka qarsoodiga ah waa la shaacin karaa:

a) Ilaa xad:

i.in shaacinta la oggol yahay ama loo baahan yahay sida uu qabo Sharcigan ama sharci kale; ama

ii.in qofka bixiya macluumaadka qarsoodiga ah loo oggol yahay shaacinteeda; ama

b) Sida hadba loogu baahdo:

i.In Agaasimaha Guud uu daabaco macluumaadka tirakoobka ee la xiriira waaxda kalluumeysiga;

ii.In awood loo siiyo hay'adaha kale ee Dowladda inay fuliyaan sharcigan iyo sharciyada kale ee Soomaaliya;

iii.Kor u qaadista wadashaqeynta iyo isku dubaridka howlaha Wasaaradda iyo maamul goboleedyada xubinta ka ah DFS iyo Wasaaradaha kale ee Xukuumadda, heer gobol iyo heerka caalami ee la socodka, xakamaynta iyo dabagalka howlaha la xiriira kalluumeysiga iyo howlaha kale ee khuseeya; ama

iv.Awood u siinaya talo siinta Agaasimaha Guud ama Wasiirka si waafaqsan ujeeddada sharcigan.

7) Agaasimaha Guud ayaa oggolaan kara bixinta macluumaadka qarsoodiga ah ee:

a) la xiriirta waqtiga ama goobta markab kasta markii ay codsato Hay'ad kasta ayada oo ujeedku yahay gacan ka geysashada ilaalinta, raadinta iyo samata-bixinta iyo ka jawaabidda xaaladaha degdegga ah; iyo

b) la xiriira ujeeddooyinka uu u arko Agaasimaha Guud inay taageerayaan hirgelinta Sharcigan, oo ay ku jiraan daahfurnaanta macquulka ah ee go'aan qaadashada.

8) Macluumaadka qarsoodiga ah waa inay sidoodii u kala soocnaadaan muddo seddex sano ah laga bilaabo taariikhda lagu dhawaaqay inay tahay macluumaad qarsoodi ah sida ku xusan faqrada sadaxaad (3).

9) Wasiirku hadba sida uu u arko waxa uu ku kordhin karaa hal ilaa saddex sano muddada macluumaadka kala soocan ee qarsoodiga ah xilliga dhammaadka muddada saddexda sano ah ee ku xusan farqada (8).

10) Qof kasta oo hela macluumaad sir ah iyadoo la raacayo sharcigan ma isticmaali karo mana kashifi karo macluumaadkaas marka laga reebo ujeedooyinka sharcigan iyo iyadoo la raacayo Hannaanka Ilaalinta Iyo Maaraynta Caalamiga ah.

11) Dhamaan macluumaadka lagu helo si waafaqsan sharcigan ama xeer hoosaadyada la xiriira waxaa loo aqoonsadey inay tahay sir qaran, loomana bandhigi karo cid aan fasax u haysan marka laga reebo ujeedooyinka waafaqsan sharcigan ama amar maxkamadeed.

12) Qof kasta oo u hoggaansami waaya shuruud kasta oo ku xusan farqadda (2) ama (10) wuxuu galayaa dambi xukun kadibna wuxuu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo ku xusan Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo hoos timaada sharcigan.

Qodobka 69

Qarinta Macluumaadka La Xiriira Xarunta La Socodkas Kalluumeysiga

1) Macluumaadka uu heley, uuna keydiyay qalabka ku xiran Xarunta La Socodka Kalluumeysiga waa inuu noqdaa mid sir ah, waxaana loo gudbin karaa oo keliya:

a) Qof loo idmay inuu xog ururiyo si uu go'aan uga gaaro in dacwad ciqaabeed lagu oogo qof;

b) dacwad-oogaha ama wakiil sharci oo idman oo u baahan macluumaadkaas ujeeddaduna tahay dacwad-qaadista ama difaaca dacwadaha ciqaabta;

c) qof awood loo siiyay inuu hubiyo u hogaansanaanta sharcigan, sharciyada kale ee Soomaaliya ama waajibaadka sharciga caalamiga ah;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Urur ku shaqo leh maaraynta kalluumeysiga, si waafaqsan tallaabooyinka Ilaalinta iyo Maaraynta Caalamiga ah iyo siyaasad kasta oo ku habboon qarinta sirta ay Wasaaraddu leedahay;

e) Hay'ad ama urur sida kuwa caalamiga ah oo ay Soomaaliya xubin ka tahay ama iskaashi kala leedahay ujeeddooyinka la socodka, xakamaynta iyo dabagalka kalluumeysiga; si waafaqsan shuruudaha qarinta sirta ay Wasaaraddu leedahay.

f) Marka bixinta macluumaadkaas ay lagama maarmaan tahay si loo sameeyo hawlgallo raadin ama samata bixin ah oo la xiriirta markab kasta;

g) Ujeeddooyin cilmi baariseed oo isku dhaf ah marka ay ogolaato Wasaaradda, ama

h) Iyadoo la raacayo siyaasadda Wasaaradda u degsan.

2) Qof kasta oo hela macluumaad ku saabsan ujeeddooyinka ku xusan faqradda (1) waa inuu u adeegsadaa ujeeddeeyinkaas oo kaliya wuxuuna u gudbin karaa macluumaadkaas qof kale oo isla ujeeddooyinkaas leh.

3) Qof kasta oo gudbiya ama u adeegsada macluumaadka si ka soo horjeedda farqadaha (1) ama (2) wuxu galayaa dambi marka ay ku caddaato wuxuu muteysan doonaa ganaax lacageed oo ku xusan Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu xusay Sharcigan.

Qodobka 70

Lahaanshaha Macluumaadka

Lahaanshaha dhammaan macluumaadka loo baahan yahay in la soo gudbiyo, la ogeysiiyo ama haddii kale la siiyo Dowladda iyo dhammaan macluumaadka ay soo diraan Aaladaha Dhaqdhaqaaq Tabinta oo qeyb ka ah nidaamka la socodka markabka ama Nidaamka Aqoonsiga Tooska ah ee ku xusan sharcigan waxaa iska leh dowladda.

Qodobka 71

Gaarsiinta Dadweynaha Macluumaadka

1. Dadweynuhu waa inay helaan macluumaadka aan loogu tala-gelin inuu ahaado qarsoodi sida ku cad sharcigan;

2. Wasaaradd ayaa qoraal ku go'aaminaysa iyadoo la tashanaysaa Hay'adaha maaliyadda ee dalka, qiimaha khidmad macluumaadka ku faafinaysa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda, taas oo looga qaadayo dadweynaha si ay u helaan macluumaadkaas.

CUTUBKA 7-AAD

RUQSADO, OGGOLAANSHO, FASAXYO KALE IYO DIIWAANGELIN

QEYBTA 1AAD

SHURUUDAHA XAALADAHA LAGA RABO RUQSADAHA, OGGOLAANSHAHA, FASAXYADA KALE IYO DIIWAANGELINTA LAGU SOO SAARAYO WAAJIBAADKA WASAARADDA

Qodobka 72

Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Fasaxyada Kale Iyo Diiwaangelinta Loo Baahan Yahay

1) Qofna kuma shaqeyn karo wax ka mid ah hawlaha soo socda isaga oo aan haysan ruqsad, Oggolaansho, Fasax ama **diiwaangelin** dhaqangal ah oo lagu soo saaray si waafaqsan sharcigan:

a) In uu isticmaalo markab Soomaaliyeed ama mid ajnabi oo kalluumaysi ama howlaha la xiriira biyaha Soomaaliya, marka laga reebo sida ku xusan farqada (3aad) ee qodobkan;

b) In uu isticmaalo markab Soomaaliyeed ama mid ajnabi oo kalluumaysi ama howlaha la xiriira meelaha ka baxsan biyaha Soomaaliya, oo ay ku jiraan biyaha sare ee badda iyo biyaha dowlad kale;

c) In markab Soomaaliyeed oo ku jira biyaha Soomaaliya ama meelaha ka baxsan dalka ee uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta kalluumeysiga uu sito, geeyo, habeeyo ama soo saaro gabbaad kalluumeedka;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) in uu soo dejiyo ama dhoofiyo kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada, sida ujeeddo kalluun-beeris;
e) In uu ka ganacsado oo uu iibiyo kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada;
f) In uu kalluun habeeyuhu hubiyo taya-qabka cuntada badda;
g) In uu sameeyo tijaabo kalluumeysi oo ay ujeeddadu tahay cilmibaarista noocyada kalluunka, qaababka ama qalabka kalluumeysiga;
h) Cilmibaaris;
i) Baaris noole badeed;
j) Kala wareejin;
k) Ka ganacsiga kalluumaysi madadaalo
l) Wax yeellayn qar-badeed (shacaabi) iyo / ama ka ganacsigiisa;
m) Ururinta iyo ka ganacsiga bocoolaha badda;
n) Horumarinta ganacsiga dhul xeebeedka;
Hawlaha ama shuruudaha kale Wasiirka ayaa ku soo saari kara Faafinta Rasmiga ah ama bogga Wasaaradda, oo ay ka mid yihiin ujeedooyinka lagu xaddidayo:

i. Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Fasaxyada ama Diiwaangelinta
ii. Ruqsadaha gaarka ah ama khidmadaha; iyo
iii. Ruqsadaha mudnaanta gaarka ah leh

2) Si ay Wasaaraddu u Diiwaan Geliso Waxaa loo Baahan Yahay:
a) In markabka Soomaaliyeed ama ruqsadda u haysta biyaha Soomaaliya ama markab Soomaali ah oo ka shaqeeya meelaha ka baxsan dalka uu leeyahay Aaladda Dhaqdhaqaaq Tebinta; iyo
b) In uu leeyahasy wakiil sharcigani oggol yahay.
3) Noocyada gaadiid badeedka kalluumeysi ee soo socda waa laga dhaafi doonaa shuruudaha ruqsad bixinta ee ku xusan farqada (1) haddii aan si kale loo qeexin:
a. Gaadiid badeed aan matoor lahayn;
b. Gaadiid badeed matooro leh, laakiin dhererkoodu guud ahaan aanu ka badnayn 4 mitir; iyo
c. Gaadiid badeed gaarka ah loogu isticmaalo kalluumeysiga madadaalada ee aan ganacsiga ahayn.
4) Hawlwadeen kasta oo u hogaansami waaya shuruudaha ku xusan farqada (1) ama (2) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.

Qodobka 73

Xaaladaha Iyo Shuruudaha Laga Rabo Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Fasaxyada Kale Iyo Diiwaangelinta

1) Ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxa ama diiwaangelinta ay Wasaaraddu ku bixisey sharcigan:
a. waxaa lagu salaynayaa tilmaamaha iyo shuruudaha ku xusan sharcigan ama sida ku qoran ku cad shuruudaha kale ee uu Wasiirku amro ama lagu sheegay Hannaanka Maareyn Iyo Ilaalinta Caalamiga ah;
b. Wasiirku waxa uu go'aamin karaa wax ku daridda, wax ka beddelka talaabooyinka iyo shuruudo dheerad ah oo waafaqsan ujeeddooyinka iyo mabaadi'da sharcigan ku xusan, taas oo noqon karta:

i. In uu amro; ama
ii. inuu ku baahiyo wasiirku Faafinta Rasmiga ah iyo bogga Rasmiga ah ee Wasaaradda halka ay kaga habboon tahay maaraynta kalluumeysiga;

c. Waxa uu dhaqan galayaa taariikhda ku xusan;iyo
d. Waxa uu ansax ahaanayaa ilaa taariikhda loo cayimyey ay dhamaato , iyada oo la raacayo muddadii uu Wasiirku u oggolaaday ruqsadda ay isku **nooc** yihiin, haddii aan si dhakhso ah loo hakin, loo joojin ama looga noqon si waafaqsan Sharcigan.
2) Hawlwadeen markab kasta oo shukaan leh, oo ay ku jiraan markab weyn ama yar, oo haysta ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lagu soo saaray sharcigan waa inuu hubiyaa in dukumiintiga asalka ah ama nooc elektaroonig ah ama nuqul la hubiyey uu markasta markabka saaran yahay, inta lagu jiro muddada ay ruqsaddu shaqeynayso, marka laga reebo waqti uu markabku ku sugnaa badda markii dukumiintiga noocaas ah la soo saaray oo uusan weli dekedda soo gelin tan iyo markii la soo saaray, taas oo nuqul elektaroonig ahaan

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

loogu soo diro uu ku filnaan doono, kabtankuna waa inuu u soo saaro dukumintiga sarkaalka idman marka uu ka codsado.

3) Qofka haysta ruqsad ama oggolaansho hawl kasta oo lagu bixiyay si waafaqsan sharcigan marka laga reebo howlaha ku saabsan maraakiibta; waa inuu keenaa ruqsadda ama oggolaanshaha ama nuqul la hubiyey xafiiska diiwaangelinta ganacsiga , marka laga codsadana waa in uu u soo saaraa sarkaalka idman ee kalluumeysiga ama qof kale oo sharcigu u oggol yahay;

4) Hawlwadeenka markab Soomaaliyeed waa inuu:

a. Mar kasta markabka dushiisa ku haystaa dukumintiga Wasaaraddu bixisey sida wasiirku go'aamiyey ama sida waafaqsan nidaamka Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah, marka laga codsadana waa in uu u soo saaraa sarkaalka idman ee kalluumeysiga ama qof kale oo sharcigani u oggol yahay, ama shuruucda kale ee la adeegsan karo kaas oo fulinaya waajibaadka Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga;

b. U hoggaansamaa dhammaan sharciyada Dowladda iyo sharciyada Dolwad-goboleedyada kale inta uu ku sugan yahay meelaha dawladdu ka taliso;iyo

c. U hoggaansamaa dhammaan Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsan karo inta uu ku sugan yahay meelaha uu ka taliyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

5) Hawlwadeen markab haysta ruqsad, oggolaansho ama fasax kale oo kalluumeysi ama howlaha la xiriira waa inuu sida shuruudaha ruqsadda ama oggolaanshuhu qabo si joogto ah u isticmaalaa buugga hawlmaalmeedka, soo gudbiyaa warbixinnada kalluumeysiga ama howlaha la xiriira iyo waqtiyadooda, warbixinnadaas oo ay ku jiraan macluumaadka iyo qaabka uu u baahan karto Wasaaradda sida uu qoraaladeeda hore tilmaamayso ama waafaqsan Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

6) Qofka haysta ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin waa inuu Wasaaradda u soo gudbiyaa warbixinta:

a. Iibinta ama wareejinta markab shirkad ama shey kasta oo ka mid ah ama ku shaqeynaya ruqsadda, oggolaanshaha, fasax kale ama diiwaangelinta, sida iibinta ama wareejinta noocaas ah;

b. wixii iska beddela macluumaadka lagu sheegay foomka dalabka, foomka diiwaan gelinta ama habab kale ama shuruud ah, si loo helo ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin, afar iyo toban maalmood gudahood ka dib marka iibinta, wareejinta ama beddelka la sameeyo.

7) Qofkii haysta ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin waa inuu u gudbiyaa Agaasimaha Guud wixii isbeddel ah ee ku saabsan macluumaadka lagu soo gudbiyey foomka dalabka ugu badnaan 14 maalmood gudahood, ama haddii kale ruqsadda, oggolaanshaha, fasax kale ama diiwaangelinta waxaa loo arkayaa in ay dhacday marka la gaaro maalinta 15aad.

8) Dhammaan ruqsadda, oggolaanshaha iyo diiwaangelinta lagu bixiyey sharcigan la isma dhaafsan karo, qofna ma:

a. Wareejin karo, mana isku dayi karo in uu ku wareejiyo ruqsadda, oggolaanshaha ama diiwaan gelinta qof kale ama markab; ama

b. U adeegsan karo mana isku dayi karo in uu u adeegsado kalluumeysi ama hawlo la xiriira ruqsad ama oggolaansho la wareejiyey ee Wasaaradda.

9) Qof kasta oo jebiya shuruudaha ku xusan faqrada (1) (a) ama (b), ama faqradaha (2), (3), (4) (a) (b) ama (c), (5)), (6) (a) ama (b), (7) ama (8) (a) ama (b) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba, ruqsaddana waa laga hakinayaa ama laga joojinaya, haddiise ay dhacdo in la jebiyo farqada (6) (a) ama (b) ee qodobkan ruqsadda la xiriira, oggolaanshaha, fasaxa kale ama diiwaangelinta waxaa loo arki doonaa mid aan ansax ahayn isla marka ay dhammaato muddada afar iyo tobanka maalmood.

Qodobka 74
Shuruudaha Rar isku Wareejinta (Transhipment)

1) Oggolaansho kasta oo shixnad kala wareejin ah waa inay ku jiraan shuruudaha soo socda:

a) Marka la joogo biyaha Soomaaliya, shixnad kala wareejinta, hawlwadeenka markabka waa inuu:

i.si elektaroonig ah codsi ugu gudbinayaa Agaasimaha Guud si loo soo dejiyo ama loo raro dhammaan kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada ee saaran markabka, codsiga waa inuu ku jiraa macluumaadka looga baahan karo

ii.Shixnadda ku kala wareejiyo goobta uu Agaasimaha Guudu cayimay;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

iii.U hoggaansamo habraacyada la amray ama laga dalbaday;
iv.Si buuxda u bixiyo dhammaan kharashaadka gaadiidka, hoyga iyo masruufka la xiriira gudashada waajibaadka sarkaalka idman ee kalluumeysiga ama qofka kale oo loo xilsaaray inuu qabto kormeerka wareejinta kheyraadka kalluumeysiga ee ka baxsan dekedda Soomaaliya;
v.Soo gudbiyo caddeynta shixnad kala wareejinta ay dalbadeen Wasaaradda ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah;
vi.U hoggaansanaado dhammaan sharciyada la xiriira ilaalinta deegaanka badda inta lagu guda jiro kala wareejinta,

b) Shixnad kalluun oo laga jilaabtey biyaha Soomaaliya, laguna kala wareejinayo biyo sare oo ka mid ah meelaha uu maamulo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ay khuseyso, hawlwadeenku waa inuu:

i.U hoggaansamo shuruudaha Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah; iyo
ii.Si buuxda u bixiyo dhammaan kharashaadka kormeereyaasha ama qof kale oo loo xilsaarey inuu kormeero kala wareejinta kheyraadka kalluumeysiga;

c) Dhegaha libaax-badeedka ee darayga ah lama wareejin karo iyaga oo aan wadan hilibkoodii iyo taa bedelkeedba, marka libax-badeedka la dejinayo uu yahay mid la qaboojiyey, marsada ugu horreysa ee markabka lagu dejinayo waa in dhegaha libaax-badeedka ee saaran markabka aanay culyskiisu ka badneyn 5% marka loo eego miisaanka guud ee libaaax-badeedka.

2) Qof kasta oo ku xadgudba shuruud kasta oo ku xusan faqrada (1aa) xarfaha (a), (b) ama (c) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn shan sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo lagu soo saaro sharcigaan.

Qodobka 75
Shuruudaha Cilmibaarista

1) Ogolaansho kasta oo cilmibaaris lagu sameynayo biyaha Soomaaliya oo la xariirta arrin kasta oo waafaqsan sharcigaan, waa inay ku jiraan shuruudaha soo socda:

a) Codsiga lagu baarayo biyaha Soomaaliya waa in:

i.Loo soo qortaa wasaaradda ugu yaraan muddo bil ah ka hor waqtiga la filayo in ay bilaabato cilmibaaristu, ama waqtiga ka horreeya oo uu cayimay Agaasimaha Guud;
ii.Uu la socdaa qorshaha cilmibaarista;

b) Qofka haysta oggolaanshaha waa in:

i.Uu keenaa Wasaaradda xaq u lahaanshahiisa ka-qaybgalka ama wakiilkiisa mashruuca cilmibaarista, iyada oo aanay waajib ku ahayn waajibaadka ka qeyb qaadashada kharashaadka mashruuca;
ii.Uu keenaa Wasaaradda warbixinno hordhac ah sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah iyo natiijada ugu dambeysa marka la dhammeeyo cilmibaarista;
iii.Uu balanqaado in ay wasaaraddu heli karto marka ay codsato dhamaan xogta iyo muunadaha laga soo dhiraandhiriyey mashruuca cilmi baarista, sidoo kale in ay heli karto nuqulka macluumaadka kale iyo muunadaha la xiriira iyadoo wax u dhimeyn qiyamka cilmi ahaan.
iv.Marka uu ka codsado Agaasimaha Guud, waa inuu keenaa Wasaaradda qiimeyn ku saabsan xogtaas, muunadaha iyo natiijooyinka cilmibaarista ama gacan ka geysto qiimeyntooda ama tarjumaaddooda;
v.Uu isla markiiba ku wargeliyaa Agaasimaha Guud marka uu dhaco isbedel weyn ah ee ku yimaada barnaamijka cilmibaarista;
vi.Haddii aan si kale lagu heshiin, waa in uu ka saaraa ama ka qaadaa wixii qalab ah ee cilmibaarista awgeed loo rakibo marka ay cilmibaaristu dhammaato;
vii.Uu si dhakhso leh ugu wargeliyaa Wasaaradda natiijooyinka baaritaanka;
viii.Uu ku wargeliyaa Wasaaradda ka hor daabacaadda cilmibaarista.

2) Qof kasta oo aan u hoggaansamin faqrada (1) xarfaha (a) ama (b), ee qodobkan ama shuruud kasta oo kale oo uu faray Agaasimaha Guud ama ku xusan sharcigan waxa uu galayaa dembi waxa uun mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigaan, oggolaanshaha cilmibaaristana qofkaas waa laga hakin karaa ama waa lagala noqon karaa ogolaanshaha.

Qodobka 76
Shuruudaha Aaladda Gabbaadka Kalluunka (AGK)

1) Howlgeliyaha markab kasta oo oggolaansho ansax ah u haysta adeegsiga (AGK) waa in:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

a) uu markasta markabka dushiisa ku hayaa buugga hawlmaalmeedka ee (AGK) oo ay ku cadyihiin macluumaadka iyo howlaha la xiriira (AGK) sida uu amray Agaasimaha Guud ama waafaqsan Hanaanka Maareynta iyo Daryeeelka Caalamiga;

b) aanu adeegsan wax (AGK) ilaa lagu sunto calaamaha ugaarka ah ama sida uu dalbaday Agaasimaha Guud, si waafaqsan sharcigan iyo Hnaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

c) Marwalba uu raadraaca meelaha la dhigay (AGK) iyo waxyaabaha la xiriira;

d) In aanu biyaha Soomaaliya ama berriga, qarar badeedka ama xeebta looga tegin AGK;

e) In loo soo gudbiyo Wasaaradda warbixin faahfaahin dhammaystiran oo ku saabsan dhammaan shirkadaha loo diiwaangeliyey (AGK).

f) Aanu qaadin, dhigin ama ururin, wax ka badan tirada (AGK) loo fasaxay;

g) Uu hubiyo in (AGK) loo qaabeeyey loona dhigay si waafaqsan shuruudaha soo socda:

i. Qaabdhismeedka dusha sare ee (AGK) aanu daboolanayn, ama kaliya lagu daboolay qalab aan shabaq ahayn ;

ii. Haddii qaybta hoose laga isticmaalo, aan lagu samayn shabaq, laakiin waxaa laga sameeyn karaa qalab aan shabaq aheyn sida xargo ama darbaallo iyo shiraacyo; iyo

iii. Haraadiga (AGK) waa in laga nadiifiyaa badda lana baabi'iyo iyada oo la raacayo tilmaamaha Agaasimaha Guud; lana isticmaalo qalab dabiiciga ah oo mudo kadib ku milmaya biyaha badda sida xaskusha, meeraxda iwm, lagana fogaadaa isticmaalka qalabka aan dabiica ahayn ee dadku sameeyaan kana sameysan maadada balaastika ah sida caagaga iwm.

h) Aan lagu xirxirin, dhisin, sababin ama la oggolaan in lagu xirxiro ama lagu dhiso wax (AGK) ah badda dusheeda;

i) Uu caddeeyaa wixii Aalad Isu Soo AGK ah oo la soo gado, uuna keenaa Wasaaradda dalabka iibka dhammaan AGK la soo gaday sannad kasta ama xilliga ruqsad bixinta hadba sida uu Agaasimaha Guud u dalbado;

j) U suurta geliyo Wasaaraddu in ay si joogto ah u hesho tebinta tooska ah ee satelayt-ka ay ku xiran yihiin AGK waqtigaa ku haboon.

k) Aan loo dhigin AGK qaab carqaladeyn kara ama xanibi kara isu socodka badda ama khatar ku ah bad-maaxidda;

l) Uu diyaariyo warbixinnada uu u baahan karo Agaasimaha Guud, si waafaqsan Sharcigan ama Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

2) Agaasimaha Guud waxa uu oggolaanshaha ku soo lifaaqi karaa wixii shuruudo dheeraad ah ee uu u arko in ay ku habboon yihiin in loo isticmaalo AGK.

3) Qofka aan u hoggaansamin shuruudaha farqada (1aad) xarfaha (a), (b), (c), (d), (e), (f), (g), (h), (i) (j), (k) ama (l) ee qodobkan ama shuruudo kale oo looga baahdo kalluumaysiga ama hawlaha la xiriira iyada oo aanu haysan diiwaangelin ansax ah oo la adeegsan karo sida ku cad farqada (3) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uu na mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba,iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigaan, oggolaanshaha cilmibaaristana qofkaas waa laga hakin karaa ama lagala noqon karaa ogolaashaha.

Qodobka 77
Shuruudaha Diiwaangelinta Nidaamka La Socodka Maraakaiibta (NLM)

1) Hawlwadeen markab kasta oo ruqsad u haysta inuu ka sameeyo kalluumeysi ama howlaha la xiriira biyaha Soomaaliya ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo loo ogolaaday inuu kalluumeysi ama howlo la xiriira ka sameeyo aagga uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka maareynta kalluumeysiga, waa in uu u hoggaansamaa shuruudaha ruqsada ama oggolaanshaha sida ku xusan qodobka 117aad ee sharcigan,waa in laga helo markabka dushiisa Aaladda isgaarsiinta moobeelka ee wasaaradda sida uu qabo Sharcigan, waafaqsanna shuruudaha dheeriga ah ee uu faray ama dalbaday Wasiirku in lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ama lagu baahiyo bogga rasmiga ah ee Wasaaradda.

2) Qofka sameeya kalluumaysi ama howlo la xiriira isagoo aan heysan diiwaangelin ansax ah oo la adeegsan karo sida ku xusan farqadda (1aad) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn hal sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan, oggolaanshaha cilmibaaristana qofkaas waa laga hakin karaa ama lagala noqon karaa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

QEYBTA 2AAD
HANAANKA BIXINTA RUQSADAHA, OGGOLAANSHAHA, DIIWAANGELINTA IYO FASAXYADA KALE EE KU CAD WAAJIBAADKA WASAARADDA

Qodobka 78
Habraacyada, Masuuliyadaha iyo Hannaanka Ruqsad Bixinta

1) Wasiirka ayaa ansixin doona habraacyada iyo mas'uuliyadaha ku saabsan daahfurnaanta iyo hufnaanta bixinta ruqsadaha , oggolaanshaha, diiwaangelinta iyo fasaxyada kale, wuxuuna u xilsaari karaa saraakiil ka tirsan Wasaaradda oo mas'uul ka noqda qabashada iyo dib-u-eegista araajida iyo soo-jeedinta talooyinka ku aaddan go'aan qaadashada wasiirka, kuwaas oo ku saabsan bixinta, diididda, hakinta ama ka noqoshada ruqsadaha.

2) Agaasimaha Guud wuxuu mas'uul ka yahay dhaqan-gelinta habraacyada iyo mas'uuliyadaha uu ansixiyay Wasiirka, kadib wada-tashi sida ugu haboon, wuxuu wasiirka u soo jeedinayaa talooyin si uu go'aan uga gaaro.

3) Macluumaadka habraacyada bixinta ruqsadaha, liiska ruqsadaha la bixiyey, iyo khidmadaha waa in laga heli karaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda.

Qodobka 79
Codsasho Ruqsad, Oggolaansho, Diiwaangelin Iyo Fasax Kale

1) Codsi ruqsad, oggolaansho, diiwaangelin iyo fasax kale sida ku xusan Sharcigan waa inuu ahaadaa foom, ay ku jiraan macluumaad, la socdaan dokumiintiyo, loona soo gudbiyaa si waafaqsan shuruudaha iyo habraacyada uu jideeyey Wasiirku ee lagu faafiyey bogga rasmiga ah ee Wasaaradda.

2) sida uu qabo sharcigan codsiga lama tixgelin doono ilaa:

a) Codsigaasi uu soo qorto markab ka shaqeeya kalluumeysi iyo hawlaha la xiriira, kaas oo wata Cadeynta Diiwaan gelintaa, Cadeynta Bedqabka iyo inuu u qalmo badmaridda, badbaadada shaqaalaha iyo Cadeynta Caymiska;

b) Codsaduhu uu yahay qofka mulkiilaha ah ama sharci ahaan ku qoran Caddeynta Diiwaangelinta;

c) Khidmadda codsiga la jideeyey ama ay dalbatay Wasaaraddu si buuxda loo bixiyey;

d) Codsaduhu yahay shirkad ka diiwaan gashan Soomaaliya, taas oo milkiilaheeda ama saamilaydeeda aanay muwaadiniin Soomaaliyeed ahayn, codsigana ay la socoto Caddeynta Oggolaanshaha oo sheegaysa lahaanshaha sharciga ah iyo saamiga shirkaddaas, codsaduhuna uu yahay mid sax ah ama sharci ah oo ku qoran Caddeynta diiwaangelinta markabka;

e) Marka laga hadlayo markab shisheeye, waa in codsiga uu la socdaa nuqulka oggolaansho oo ansax ah oo waafaqsan nidaamka kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira biyaha Soomaaliya ee ay soo saartay dawladda **calankeedu uu sito.**

f) marka laga hadlayo markab shisheeye, markab wada-lahaansho ah ama markab soomaaliyeed, codsaduhu waa in uu cadeeyaa in aysan qeyb ka aheyn, wax xiriir ahna la laheyn koox dambiilayaal heer caalami ah, isla markaana dammaanad qaadaa in aanay ka qeyb noqon doonin inta lagu guda jiro muddada shatigu ansaxa yahay.

3) Marka la joogo sharcigan codsiga lama tixgelin doono haddii:

a) Ay jiraan sababo macquul ah oo lagu aamini karo in milkiilaha, hawlwadeenka ama qof kale oo ku lug leh kalluumeysiga ama howlaha la xiriira; lala xiriiriyo koox dembiileyaal ah oo heer caalami ah;

b) Aan macluumaad run ah, sax ah oo dhammaystiran lagu buuxin foomka dalabka codsiga, ama macluumaadku uu noqdo mid been ah, mid marin habawsan, mid khaldan ama aan dhameystirnayn;

c) Shahaadada Diiwaangelinta ee markabka laga soo saaray Soomaaliya, laakiin Agaasimaha Guud aanu horay u ansixin diiwaangelinta si waafaqsan sharcigan iyo habraacyada loo dejiyey;

4) Wasaaraddu waxa ay sameyn kartaa baaritaan kasta si loo xaqiijiyo macluumaadka lagu soo gudbiyey qodobkaan; dhammaan dadka ku lugta leh codsiga ruqsadda, oggolaanshaha, fasax kale ama diiwaangelinta waa inay si buuxda ula shaqeeyaan baarayaasha iyo u hoggaansanaanta baaritaankaas.

5) Qofka aan laga helin wadashaqeyn buuxda ama u hogaansamin baaritaanka sida ku xusan farqada (4aad) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaray sharcigaan, qofkaasna looma soo saari doono ruqsad, ogolaansho, fasax kale ama diiwaangelin.

6) Ka dib marka la bixiyo ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin oo la ogaado in macluumaadka, caddeynta ama dukumiintiyadii looga baahanaa codsiga ee qodobkaan lagu sheegay ay ahaayeen been abuur ama marin habaawsanaayeen, ruqsadda, oggolaanshaha, fasax kale ama diiwaangelinta waxaa loo qaadan doonaa mid aan ansax ahayn isla markaasna waa lagala noqon doonaa.

Qodobka 80
Heerarka Lagu Ansixinayo Diiwaangelinta Maraakiibta

1) Codsi kasta oo uu diiwaan gelin ku dalbanayo markab kalluumeysi oo u habaysan howlo kalluumeysi ama howlo la xiriira kana howlgalaya biyaha Soomaaliya, oo ay ka mid yihiin maraakiib shisheeye, maraakiib kireysan iyo maraakiib wada-lahaanshaha ah; Wasaaradda Dekedaha iyo gaadiidka Baddu ma siin karto diiwaan gelin iyo calan ilaa marka hore Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ay ka hesho oggolaansho.

2) Haddii uusan Agaasimaha Guud ogolaanin in la diiwaangaliyo mrkab shisheeye si ruqsad loo siiyo oo uga shaqeeyo biyaha Soomaaliya ama ogolaansho iyo fasaxyo kale waxaa loo aqoonsanayaa mid aan ansax ahayn sida ku xusan sharcigan qodobkiisa 82aad faqrada 1aad.

3) Marka uu oggolaanayo codsiyada maraakiibta kalluumeysiga, Agaasimaha Guud wuxuu eegayaa hawlaha markabka iyo heerkiisa, oo ay ka mid yihiin:

a) howlaha markabka iyo hawlwadeennadiisa, oo kamid yihiin:

i. In markabkani uu yahay ama uu ku jiray diiwaanka maraakiibta sharci darrada ah, oo ay gacanta ku hayaan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga ;

ii. In markabkaas ama hawlwadeenka markabku uu ku lug lahaa wax kasta oo aan waafaqsaneyn sharciyada kalluumeysiga ee qaranka ama Xeerka Maareynta Iyo Ilaalinta Calamiga ah tobankii sano ee la soo dhaafay;

iii. In markabkaas, hawlwadeenka markabka ama shaqaalihiisu ay ku lug lahaayeen falal dembiyeedyada caalamiga ah ama koox dembiileyaal abaabulan ah tobankii sano ee la soo dhaafay;

iv. Hawlo kasta oo kale oo laga yaabo oo ay suurta gal tahay mustaqbalka in aan loo hoggaansami doonin Sharcigan; iyo

b) La hubiyaa in loo hoggaasamay xeerarka caalamiga ah ee lagu heshiiyey, oo kala ah:

i. Heerarka caalamiga ah ee aqoonsiga iyo caalamadeynta markabka;

ii. Macluumaad buuxa oo ku saabsan milkiilayaasha markabka iyo Hawlwadeenada taas oo tilmaamaysa lahaanshaha iyo faa'iidada milkiilaha iyo Hawlwadeenada ay ku leeyihiin markabka; iyo

iii. Macluumaad buuxa oo ku saabsan taariikhda markabka oo la xaqiijiyay la keenay oo ay ku jiraan aqoonsiga calankii hore iyo magac beddelka;

iv. Astaamaha markabka iyo inuu ku habboon yahay arrimaha kalluumeysiga ama howlaha la xiriira iyo in uu u hoggaansamay Sharcigan;

v. In markabku uu ku jiro diiwaanka maraakiibta bedqaba oo ay gacanta ku hayso Urur Goboleedka Maaraynta Kalluumeysiga ;

vi. Iyo heerarka kale ee caalamiga ah ee lagu heshiiyay, oo ay ka mid yihiin midka Hay'adda Cuntada Adduunka 2014 Habraacyada Isxilqaan Hawl-fulineed ee Dalka Calanka (2014 FAO Voluntary Guidelines of Flag State Performance)

Lama ogolaanayo diiwaan gelinta markab ama hawlwadeen haddii ay ku caddaato in ay mar hore hoggaansami waayeen; ilaa laga beddelo mulkiyadda markabka oo mulkiilaha cusub xaqiijiyo in mulkiilihii hore uusan wax shaqo ah ku laheyn maamulka markabka.

4) Maraakiibta ka diiwaan gashan laba waddan ama ka badan lama ogolaanayo diiwaangelintooda; marka laga reebo xaaladaha diiwaangelin is-barbar socota muddo ku meel gaar ah, sharcigana waafaqsan.

5) Marka laga soo tago farqada (3aad) ee qodobkan, maraakiibta taariikhdoodu aanay waafaqsaneyn sharcigan lama diiwaangelinayo, marka laga reebo in lahaanshaha markabka uu si toos ah isu beddelay oo milkiilaha cusubna uu keenay caddeymo ku filan oo muujinaya in milkiilihii hore ama hawlwadeenkii hore aanay hadda wax sharciyad ah, nacfi ah ama dano dhaqaale ah ama awood ah ku laheyn markabka.

6) Ogolaanshaha diiwaangelintu waxa ay ansax noqonaysaa ilaa iyo laba sano.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

7) Haddii oggolaanshaha hore ee diiwaangelinta lagu saleeyo nidaamyada iyo habraacyada ku xusan faqradaha (1) iyo (2), ee qodobkan, oo ay dhacdo in ay wax iska beddelaan duruufihii jiray inta lagu guda jiro muddada ay laalan tahay diiwaangelinta u hoggaansamid la'aan nidaamyada darteed ama la ogaado in ansaxintii hore ay ku saleysneyd macluumaad been ah, khaldan ama aan dhameystirneyn, Agaasimaha Guud waxa uu ku wargelin doonaa Wasaaradda mas'uulka ka ah diiwaangelinta, markabkana isla markiiba waa lagala noqon doonaa diiwaangelinta, ruqsadda, oggolaanshaha, fasaxyada kale ama diiwaangelin kale oo lagu soo saaray Xeerkan, waxaana loo tixgelin doonaa mid aan ansax ahayn oo laga noqday.

Qodobka 81

Baaritaano lagu Hubinayo Markabka ka hor Diiwaangelinta Iyo Ruqsad siinta

1) Iyada oo la tixgelinayo codsiga Hawlwadeenka markabka ee uu ku codsanayo ruqsad, oggolaansho ama fasaxyo kale ama diiwaangelin markab si waafaqsan sharcigan ama ku xusan sharcuucda dalka, ka hor inta aan la bixin wax ruqsad, oggolaansho ama fasax kale ah ama oggolaanshaha diiwaangelinta waa in:

(a) uu ka caawiyaa Agaasimaha Guud, baaritaanka, sahaminta markabka loogu talagalay in loo adeegsado kalluumeysiga ama howlaha la xiriira iyo shuruudaha kale ee dekedda u degsan ee uu ansixiyay Agaasimaha Guud, hadba waqtiga iyo sida Agaasimaha Guud uu go'aamiyo; waana

(b) Inuu buuxiyo shuruudaha uu dhigayo sharcigan ee ka horeeya ruqsad siinta iyo diiwaangelinta oo uu jideeyey ama amray Wasiirku, laguna baahiyay bogga rasmiga ah ee Wasaaradda;

2) Sida uu qabo xarafka (a) ee faqrada (1aad) ee qodobkan howlgeliyuhu waa in waqti aan ka yareyn siddeed iyo afartan saacadood ka hor waqtiga la filaayo in markabku dekedda kusoo xirto uu Wasaaradda ku soo wargaliyaa culeyska kalluunka uu sido iyo noocyadiisa uuna ku soo xirtaa dekedda Wasaaraddu u cayintay.

3) Sarkaalka idman ee kalluumeysiga waa inuu sameeyaa hubinta iyo baaritaanka ka horreeya bixinta ruqsad ama diiwaangelinta markabka si waafaqsan xeerkan iyo shuruudaha uu ansixiyo Wasiirku, waxaa intaa dheer Agaasimaha Guud wuxuu u magacaabi karaa baare si uu u sameeyo baaritaankaan.

4) Wasaaraddu waxa ay dib u eegis ku sameynaysaa dhammaan dukumintiyada looga baahan yahay markabka si loogu soo saaro ruqsad,diiwaangelin, oggolaansho ama fasax kale.

5) Shuruudaha ku xusan qodobkan howlgeliyaha markabku waa inuu:

a) U oggolaado oo caawiyo sarkaal kasta oo idman oo kalluumaysi iyo baaraha sahminaya si ay u fuulaan una baaraan markabka ama haddii kale ay u gutaan waajibaadkooda ku xusan sharcigaan.

b) Waa in uu kenaa Wasaaradda dhammaan dokumentiyada iyo macluumaadka looga baahan yahay diiwaangelinta, ruqsadsiinta, oggolaanshaha ama fasaxyo kale.

6) Marka laga soo tago faqrada (1) ee qodobkan, waxaa laga yaabaa in Agaasimaha Guud uu qabto waqti lagu sameeynayo baaritaan ka dib marka ruqsad la siiyo, xaalado gaar ah oo jira awgeed, waqtigaas oo aan ka badnayn laba toddobaad.

7) Hawlwadeen kasta oo u hogaansami waaya shuruud kasta oo ku xusan farqadaha (1), (2), (3) ama (6) (a) ama (b) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi, waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigaan, waliba waxaa intaa dheer haddii howlgeliyuhu aanu buuxin shuruudaha ku xusan farqadaha (1) (a) ama (b) lamasiinayo ruqsad, oggolaansho ama fasax kale sida uu qabo sharcigan.

Qodobka 82

Hababka Bixinta , Cusboonaysiinta Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Diiwaangelinno Iyo Fasaxyada Kale

1) Wasiirka oo tixgelinayaa talooyinka Agaasimaha Guud, waxaa uu oggolaanayaa ama diidayaa codsiyada ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale ama diiwaangelin kasta sida ku xusan sharcigaan, marka laga reebo in la diiday ruqsadda talo soo jeedin kadib.

2) Talo soo jeedinta Agaasimaha Guud ee bixinta ama cusbooneysiinta ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale ama diiwaangelinada ku xusan Sharcigan, Agaasimaha Guud waa inuu la socdaa xaaladaha, hawlwadeenka, milkiilala, markabka kireysan ama qof kale ama shirkad kale ee ay arrinta markabku khuseyso ama markabka, in:

a) Uu u hoggaansamay sharcigan, shuruucda kale ee Soomaaliya, shuruudaha kale ee looga baahan yahay in lagu siiyo ruqsadaha iyo heshiis kasta oo la geli karo;

b) Uu u hoggaansamay shuruudo kasta oo khuseeya magacaabista wakiilka/ wakiilada, wakiilkuna u hogaansamay sharcigan iyo Shuruucda kale ee Soomaaliya;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Uu u hoggaansamay shuruudaha badmaridda iyo badbaadada.
d) Uu keenay dhammaan xogta iyo macluumaadka looga baahan yahay iyo tilmaamaha markabka, si dhakhso leh oo sax ah, xogtaas oo ay ku jirto nidaamka la socodka markabka;
e) Uu u hoggaansamay dhamaan Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah iyo nidaamyada kale ee heer gobol iyo heer caalami ee ku habboon;
f) In uu ku jiro diiwaanka maraakiibta idman ee Urur Goboleedka Maaraynta Kalluumeysiga
g) In aanu aheyn ama xiriir la laheyn markab ku jira diiwaanka maraakiibta uu tilmaamay Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga , kuwaas oo ku calaamadeysan kalluumaysi ama howlo la xiriira oo sharci-darro ah;
h) In uu ku habboon yahay ujeeddada laga leeyahay codsiga; iy
i) In uu awoodo u hoggaansamida sharcigan.
3) Qodobkan, "sifooyinka markabka" waxaa ka mid ah nooca, dhismaha, awoodda, Matoorka iyo astaamaha kale ee markabka, iyo qeexitaanno iyo macluumaad kale oo la xiriira qalabkiisa, agabkiisa iyo diyaarado.

Qodobka 83

Sababaha Diidmada Cusboonaysiin La'aanta Ruqsadaha, Oggolanshaha Iyo Diiwaangelinta.

1) Bixinta ama cusboonaysiinta ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale ama diiwaangelinta ku xusan sharcigan waa uu diidayaa Agaasimaha Guud marka uu ogaado:
a) In nidaamyada u degsan ama lagu sheegay qodobka 84aad aan marnaba la buuxin;
b) In jilaabashada kalluunka looga baqo inuu yaraado ama hoos u dhaco;
c) In hawlwadeenka markabku u hogaansami waayey ama fulin waayey shuruudihii ka hor ruqsad siinta sida ku cad qodobka 83aad;
d) In hawlwadeenka markabka horey loogu xukumay dembi la xiriira daacad darro ama khayaano;
e) Marka laga soo tago qodob kale oo ku dhigan sharcigan, in hawlwadeenka markabka ama markabku uu ku jiro heshiis aanu si buuxda u fulin, Sharcigan ama wax kasta oo khuseeya Hannaanka Maareynta yo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsado;
f) In ay jirto caddeyn ku filan in hawlwadeenka ama qof kale oo xiriir la leh markabka uu ku kacay kalluumeysi sharci-darro ah ama howlo la xiriira ama waxyaalo kale oo sharci darro ah, isla markaana uusan ku qancin xukun kasta ama go'aan kasta oo isaga khuseeya ama uu ku lug lahaa koox dambiilayaal abaabulan ama dembi caalami ah;
g) In hawlwadeenka markabku uu dembi ku galay biyaha Soomaaliya, ama markabka loo adeegsaday fal-dambiyeed, kaas oo dacwaddiisu aan weli la soo gabagabeyn;
h) In hawlwadeenka markabka lala xiiriiriyo markab ku jira diiwaanka maraakiibta ku howlan kalluumeysiga sharci darrada ah ee uu hayo Urur Goboleedka Maareynta Kaluumeysiga;
i) In markabku ka sito calan dal loo aqoonsaday in uu yahay "wadan ku can ah sumcad xumi u hogaansnaanta qawaaniinta caalamiga ah", sababtoo ah waxa uu ku guuldareystay masuuliyaddii uu lahaa Dalka Calanku, sida shuruudaha ku xusan cutubka 2aad. ee FAO Habraacyada Isxilqaan Hawl-Fulineed Ee Dalka Calanka;
j) In markabku aanu ku habbooneyn ujeeddada codsiga uu soo dalbaday;
k) In markabku ku xadgudbay heshiiska nidaamyada dekedda dalka ee waafaqsan hannaanka maareynta iyo ilaalinta, ayadoo la hayo caddeyn sax ah in markabku uu galay hawlo kalluumaysi sharcidarro ah oo hawlwadeenku ama markabku aanu soo gudbin sharciyada ama habraacyada kale ee ay ka dalbadeen Dalka Dekedda, Dalka Xeebta ama Dalka Calanka.
l) Mid ama dhammaan codsadaha, milkiilaha ama hawlwadeenku aanu:
i. U hogaansamin shuruudaha ruqsadda ee hadda jira ama kuwii hore ama wixii shuruudo kale ah ee ku xusan Sharcigan;
ii. U hoggaansamin sharci kasta oo Soomaaliyeed; iyo
iii. Soo gudbin sida sharcigani dhagayo, iyada oo la tixraacayo go'aamada ama xukunka loo adeegsanayo, qofkii u hoggaansami waaya ama si buuxda loogu qanci waayo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Haddii macluumaadka ku jira codsiga ruqsad, oggolaansho, diiwaangelin ama cusbooneysiintiisa lagu helo in ay been tahay, marin habaabin ama khaldan tahay macno ahaan, Agaasimaha Guud wuxuu soo jeedin karaa in ruqsadda, oggolaanshaha ama diiwaangelinta aan la siin ama aan la cusbooneysiin.

3) Ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lama siinayo, lamana cusbooneysiinayo ilaa laga bixiyo dhammaan khidmadaha, ujurooyinka ama canshuuraha uu farayo Sharcigan.

4) Ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lama siinayo ama dib looguma cusbooneysiinayo markab shisheeye oo horey ruqsad kalluumeysi ama hawlo la xiriira looga siiyay dowlad shisheeye haddii markabkaasi uusan ixtiraamin Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsado oo:

a) Dal Shisheeye ay joojisay ruqsaddii hore, oo joojintuna aanay dhammaan; ama

b) Dal Shisheeye, seddexdii sano ee la soo dhaafay ee ka horreysay soo codsashada ruqsadda ee sharcigan laga noqday ruqsaddiisii hore.

5) Xaddidaadda faqarada (4aad) ee qodobkan ma dhaqan galayso haddii:

a) lahaanshaha markabka la beddelay ka dib markii markabkaasi uu wiiqay sharci ahaanshaha hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee la adeegsan karo; iyo

b) Mulkiilaha cusub uu u keenay Agaasimaha Guud cadeymo uu ku muujinayo in milkiilihi hore uusan faa'iido, dhaqaale, dan dheeraada ama sharciyad ku lahayn markabka.

6) Agaasimaha Guud waxa uu qoraal ku ogeysiinayaa codsadaha in loo diiday ruqsadda siinta ama cusbooneysiinta, oggolaanshaha, fasaxa kale ama diiwaangelinta iyo sababaha loogu diiday.

Qodobka 84
Racfaan

1) Wasiirka oo la tashanaya Wasiirka Caddaaladda, waxa uu dhisayaa Guddi Rafcaan oo aan ka badneyn saddex qof oo aqoon u leh arrimaha kalluumeysiga ama sharciga kalluumeysiga, kuwaas oo ay ka mid noqonayaan haddii ay suurtagal tahay, ugu yaraan hal sarkaal dawladeed ah iyo hal qof oo bulshada rayid ah ka socda.

2) Guddiga racfaanku waxa uu yeelanayaa waajibaadka dhageysiga iyo go'aaminta rafcaannada ka yimaada go'aamada Wasiirka, kuwaas oo la xiriira ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale,diiwaangelinta, iyo shuruudaha lagu heshiiyey ee gudddiga loo aasaasay, Guddiga Racfaanka ayaana sheegaya in go'aannadoodu ay kama dambeys yihiin.

3) Guddiga Racfaanka ayaa go'aaminaya habraacyadooda, waxa ayna rafcaan qaatayaasha u gudbinayaan qoraal ogeysiis ah oo ay ugu sheegayaan go'aannadooda iyo sababaha.

Qodobka 85
Ujuuro, Kharashaad Iyo Canshuur

1) Dhammaan ujurooyinka, khidmadaha iyo canshuuraha uu jideeyey ama faray Wasiirka sida uu qabo qodobkan waxaa lagu soo bandhigayaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda ama waxaa lagu qeexayaa nidaamyada heshiiska kalluumeysiga.

2) Wasiirka ayaa jideyn kara ama qori kara ujurooyinka, khidmadaha iyo canshuuraha la xiriira shuruud kasta ama hawl kasta oo hoos imaanaysa sharcigan, oo ay ka mid yihiin

a. Ruqsadaha, ogolaanshaha diwaangakinta iyo fasaxyada kale;
b. Ogolaanshaha diiwaangelinta maraakiibta;
c. Wakiillada;
d. Kala wareejinta;
e. Dejinta;
f. Maaraynta xarunta la socodka maraakiibta habka warbixinta elektarooniga ah iyo habka kormeerka elektarooniga ah;
g. Kormeereyaasha; iyo
h. Kharashyada kale ee looga baahan karo arrimaha ku xusan Sharcigan.

3) Ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin la bixiyey ama lagu cusbooneysiiyay Sharcigan waxa ay ku xirnaaneysaa bixinta kharashyada soo socda, oo ah qaddarka uu jideeyey Wasiirku:

Khidmada codsiga;
khidmada soo saarista ruqsadda;
khidmadda cusboonaysiinta; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Khidmadaha kale, ujurooyinka ama canshuuraha sida ku xusan Sharcigan ama sida uu faro ama oggolaado Wasiirku.

4) Lacag la bixiyey lama soo celin doono marka laga reebo lacag bixin saami gal ah si waafaqsan Sharcigan.

5) Marka ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin la siiyey qof iyada si waafaqsan Sharcigan, uuna lumo, burburo ama hallaabo oo Agaasimaha Guud uu ku qanco in uu lumay; Agaasimaha Guud waxa uu amrayaa in la bixiyo 30% qimahii hore ee ruqsadda ama wixii kale ee Wasiirku go'aamiyo, si loogu soo saaro nuqul kale oo ay ku jiraan wixii macluumaad ah ee la ansaxiyay ama la geliyay ruqsaddii hore, oggolaanshihii ama fasaxii burburay ama hallaabay, nuqulka la soo saarana wuxuu ahaanayaa ruqsad asal ahaa oo kale.

6) Ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin ay beddeshay wasaarad aan sharciyad u haysan ama la halleeyey ama la jeexjeexay waxaa loo qaadanayaa inay tahay ruqsad aan ansax ahayn marka loo eego ujeeddada Sharcigan.

Qodobka 86

Muddada ruqsadaha, oggolaanshaha, diiwaangelinta Iyo fasaxyada kale

Dhammaan ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale iyo diiwaangelinta la soo saaray iyada oo la raacayo Sharcigan, haddii aan la hakin, laga noqon ama si kale loo joojin; muddada ugu badan ee uu ansaxa yahay waa hal sano laga bilaabo taariikhda la soo saaray, Wasiirkuna waxa uu jideyn karaa waqti intaa ka yar.

Qodobka 87

Hakin, ka noqosho ruqsad,Baabi'in oggolaansho diiwaangelin Iyo fasaxyada

1) Wasiirku waxa uu hakin ama joojin karaa ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin si waafaqsan habraacyada la tilmaamay, sababaha soo socda awgeed;

a) Qofka ruqsadda haysta haddii uu ku xadgudbay;
Sharcigan ama shuruudaha lagu qeexay ruqsadda ama oggolaanshaha;
heshiis kasta oo khuseeya; ama
Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsado;

b) Qofka ruqsadda heysta haddii uu codsiga ku buuxiyay macluumaad been ah, marin habaabin ama aan dhameystirneyn;

c) Qofka ruqsadda haysta haddii uusan soo gudbin ama uusan bixin ganaaxa ama ciqaabta nidaam sharciga ah, garsoore ama maamul uu ka dalbaday, ama uu u hoggaansami waayey amar garsoor ama go'aan maamul;

d) Hadii dal kale ay ka hakiyaan ama ka joojiyaan ruqsadda ama oggolaanshaha markab Soomaaliyeed oo la siiyay ruqsad ama oggolaansho ah inuu ka kalluumeysto biyaha dalkaas sababo la xiriira kalluumeysi sharci dharro ah ama howlo la xiriira ama ku tumasho sharci;

e) Hadii ay jireen isbeddel ku yimid duruufo saamaynaya shuruudaha looga baahan yahay sharciyada ruqsadda, oggolaanshaha ama diiwaangelinta

f) Hadii ay dhaceen wax isbeddel ah tan iyo markii la bixiyay ruqsadda, oggolaanshaha ama diiwaangelinta oo ku saabsan shuruudahan, sida uu jideeyo ama uu go'aamiyo Wasiirku, isaga oo go'aankiisa ku salaynaya talooyinka uu soo jeediyo Agaasimaha Guud.

g) Haddii ay lagama maarmaan noqoto in sidaas la sameeyo si loo ilaaliyo sii jiritaanka ka faa'iideysiga kheyraadka kalluumeysiga ama loo hirgeliyo hannaan kasta oo Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah;

h) Haddii u qalmidda bad maridda, badbadada iyo heerka nolosha shaqaaluhu aanay waqti kasta aheyn sidii la doonayey;

i) Haddii caddaymo ku filan loo hayo in milkiilaha, hawlwadeenka ama kabtanku uu ku kacay kalluumeysi kasta oo sharcidarro ah ama wax la xiriira, oo aan lagu sheegin qodobkan ama hawl kale oo sharci-darro ah ama lala xiriiriyo koox dambiilayaal abaabulan ama fal-dembiyeedyo heer caalami ah;

j) Haddii macluumaadka ku jira codsiga lagu siiyey ruqsadda ama cusboonaysiinta ruqsadda laga helo been abuur, marin habaabin ama aanu sax ahayn; ama

k) Haddii ay jiraan sababo kale oo la sheegi karo.

2) Wasiirku waxa uu hakinayaa ama baabi'inayaa ruqsad ama fasax, iyadoo la raacayo habraacyada la jideeyey, marka:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

a) Sidaa Sharcigan ku xusan ama heshiis oggolaansho kasta ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah;
b) loo baahdo in lagu qaado dacwad maamul ama caddaalad qofka haysta ruqsadda si waafaqsan Sharcigan;
c) haddii uu yahay markab shisheeye oo ruqsad uu siiyey dalka calanku laga hakiyey ama lagala noqday.
3) Hakinta ama baabi'inta ruqsadda ama oggolaanshaha si dhaqso ah ayuu Agaasimaha guud qoraal ogeysiis ah ugu gudbinayaa qofka haysta ruqsadda.
4) Marka waqtiga heshiiska soo-gelitaanka khuseeya uu dhammaado iyadoo ay weli ruqsadu ansax tahay, ruqsadaasi isla waqtigaas ayey dhacaysaa oo ansax ma sii ahaanayso.
5) Qofka ruqsaddiisa ama ogolaanshihiisa laga hakiyey ama baabi'iyey sida ku xusan faqrada (1aad) ama (2aad) ee qodobkan, xaq uma laha in loo celiyo wixii khidmad ah, canshuuro, ama lacag kale oo laga bixiyay ruqsada.
6) Iyadoo la tixraacayo farqada (4aad) ee qodobkaan, waa in laga qaado lacag loogu cusboonaysiiyo ogolaanshaha soo galidda iyo ruqsadda, iyadoo la waafajinayo faqrada (1aad) xarafka (g) ee qodobkan.
7) Qof kasta oo haysta ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lagu soo saaray sharcigan oo laga joojiyey ama laga hakiyey waa inuu dukumiintiyada ku wareejiyaa Wasaaradda marka uu sidaas dalbado Agaasimaha Guud, iyadoo aan wax waajibaad ah la saareyn ilaa laga cadeynayo ama laga hubinayo inuu mutaystay ganaaxyo ka hor taariikhda dhiibista ruqsada.
8) Qof kasta oo meel ka hela ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lagu soo saaray sharcigan waa inuu u ku wareejiyaa Wasaaradda ama saldhigga booliiska ee ugu dhow
9) Qof kasta oo;
Ku hawlgala ruqsada, ogolaanshah, fasaxa kale ama diiwaangelinta la siiyay ka dib markii uu helay ogeysiiska hakinta ama kala noqoshada sida uu qabo Sharcigan; ama
Lagu helo isaga oo isticmaalaya ruqsad, oggolaansho ama diiwaangelin lagu soo saaray sharcigan, oo uusan isagu lahayn mulkiyaddeeda;
Waxa uu galayaa dembi marka ay ku cadaato, waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn shan sano ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo lagu soo saaro sharcigan.

CUTUBKA 8-AAD
KORMEER, XAKAMEYN IYO ILAALIN
QEYBTA 1AAD
MAAMULKA
Qodobka 88
Iskaashiga Mas'uuliyadaha ilaalinta Iyo Xakamaynta

1) Wasiirku wuxuu magacaabayaa Waax mas'uul uga noqon doonta Soomaaliya kormeerka, xakamaynta, ilaalinta iyo dhaqangelinta sharcigan iyada oo la raacayo tilmaamaha guud ee Wasiirka.
2) Waaxdu waxa ay fulinaysaa waajibaadka iyo mas'uuliyadaha Wasaaradda, waxa ay isku dubarid iyo wadashaqeyn wax ku ool ah la yeelanaysaa;
Dawladaha xubinta ka ah dawlada federaalka;
Wasaaradaha kale ee qaranka, wakaaladaha, iyo ururada ay khusayso; iyo
Urur goboleedyada ama kuwa caalamiga ah ee xiriirku shaqo kala dhexeeyo, iyada oo kormeeraysa, xakamaynaysa, ilaalinaysa oo fulinaysa hawlgalada iyo arrimaha ku xusan xeerkan.

QEYBTA 2AAD
SARAAKIIL KALLUUMAYSI, BAARAYAAL IYO KORMEERAYAAL IDMAN
Qodobka 89
Magacaabista Saraakiisha Kalluumeysi Ee Idman

1) Agaasimaha Guud waxa uu soo jeedinaya saraakiil kalluumeysi oo idman, iyada oo la raacayo habraacyada, shuruudaha iyo heerka aqoontooda si uu u ansaxiyo Wasiirku.
2) Shakhsiyaadka soo socda ayaa loo arkaa inay yihiin saraakiil idman oo kalluumeysi, sida ku cad sharcigani:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Agaasimaha guud
Saraakiisha Wasaaradda, kuwaas oo Agaasimaha Guud soo jeediyey in ay yihiin saraakiil idman Wasiirkuna ansixiyo soo jeedinta Agaasimah Guud
Ciidanka Badda iyo difaaca xeebaha Soomaaliya, Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Qeybta Booliska Xeebaha iyo saraakiisha kale ee khuseyso shaqada badda, ayadoo uu Wasiirka uu qoraal ku ansixiyo saraakiishaas.

Qodobka 90

Magacaabista Baarayaasha

1) Wasiirku waxa uu soo saari karaa xeerarka magacaabista, shaqooyinka, xilalka iyo shuruudaha kale ee baarayaasha hawl kasta oo waafaqsan sharcigan, oo ay ku jiraan baarayaasha kalluunka ujeedooyinka laga leeyahayna ay tahay baaritaanka tayada kalluunka iyo wax soo saarka kalluunka.

2) Agaasimaha Guud waxa uu qoraal ku magacaabayaa qof ama koox baarayaal kalluumeysi ah, iyada oo ujeedadu tahay baaritaannada iyo warbixinnada hawlaha si waafaqsan sharcigan iyo waajibaadka la xiriira sida ku xusan faqrada (1aad) waafaqsanna habraacyada, shuruudaha iyo tayada uu wasiirku oggolaado.

Qodobka 91

Magacaabista kormeereyaasha Iyo Shaqadooda

1) Agaasimaha Guud waxa uu qoraal ku magacaabi karaa qof ama koox kormeerayaal ah, iyada oo ay ujeeddadu tahay kormeeridda, aruurinta, qoridda iyo soo gudbinta warbixin la isku halleyn karo oo sax ah iyo xog cilmi ah, kormeerid, maamulid iyo u hogaansanaanta ujeeddooyinka hoos yimaada sharcigan, iyada oo la raacayo habraacyada, shuruudaha iyo tayada uu wasiirku oggolaado.

2) Agaasimaha Guud uma magacaabi karo kormeere qof kasta oo dano toos ah ama dadban ama xiriir la leh markabka, hawsha ama dadka la kormeerayo, sida hawlwadeenka, xubin ka tirsan shaqaalaha markabka ama qof kale oo xiriir la leh milkiilaha markabka ama hawlwadeenka, qofka noocaas ahna looma oggolaan karo inuu noqdo kormeere markab kasta ama hawl kasta si waafaqsan sharcigan.

Qodobka 92

Isticmaalka Awoodaha Iyo Howlaha Loo Idmay Saraakiisha Kalluumaysiga, Baarayaasha iyo Kormeerayaasha

1) Saraakiisha kalluumeysiga ee idman, baarayaasha iyo kormeereyaashu waa in ay sameeyaan kormeer, xakameyn, ilaalin iyo in loo hoggaansamay hawlaha si waafaqsan sharcigan meelaha uu khuseeyo, oo ay ka mid yihiin:
Meelaha Dawlada Soomaaliya ka taliso; iyo
Meelaha ka baxsan inta Dawladda Soomaaliya ka taliso ee sharcigan lagu dabaqi karo sida ku xusan qodobka 3aad, iyada oo la raacayo shuruudaha sharcigan iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga, heshiiska ama sharuucda caalamiga ah, ee la xiriira markab kasta oo Soomaaliyeed, markab aan dal ka diiwaan gashanayn ama arrimo kale oo hoos imaanaya shuruudahaan.

2) Marka saraakiisha idman ee kalluumeysiga, baarayaasha iyo kormeereyaashu ay u gutaan howlahooda si waafaqsan faqrada (1aad) xarafka (b), qodobada ku xusan sharcigan ayaa lagu dabakhayaa haddii ay si ku haboon u gudan waayeen waajibaadkooda lagana fulinayey meelaha xeer xeyndaabka Soomaaliya.

3) Sarkaal kasta oo kalluumaysi oo idman, baare ama kormeere kasta, marka uu gudanayo waajibaadkiisa waxa uu wadan doonaa aqoonsi ay soo saartay ayna ansixisay wasaaradu, waxa ayna ku soo saari doontaa codsiga u jeedada aqoonsiga, aqoonsiga la soo saarana ilaa wax burinaya laga helo wuu ku filnaan doonaa u adeegsiga awoodaha iyo shaqooyinka ku xusan sharcigan

Qodobka 93

Awoodaha guud ee Saraakiisha Idman Ee Kalluumaysiga

1) Sarkaalka idman ee kalluumeysiga waxa uu qaadi karaa talaabooyin, bixin karaa awaamiir lagama maarmaan u ah fulinta ujeeddooyinka ama qabashada shaqooyinkiisa, awooddiisa iyo waajibaadkiisa sida ku xusan Sharcigan.

2) Sarkaalka idman ee kaluumeysiga waxa uu si macquul ah u isticmaali karaa awooddiisa iyo waajibdkiisa marka ay lagama maarmaan tahay sida ku xusan sharcigaan.

3) Sarkaalka idman ee kaluumeysiga wuxuu u baahan karaa qof caawiya;
In la keeno markab meel ka mid ah Soomaaliya si waafaqsan Xeerkan; ama

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Xaaladaha marka loo baahdo caawimaad ku saabsan in si degdeg ah loo dhaqangeliyo sharcigan.
Qofkaasna waxaa loo arkaa inuu leeyahay awoodda sarkaalka idman ee kalluumeysiga, markaas oo ah waqtiga looga baahan yahay sarkaalka inuu arrinta wax ka qabto, marka laga reebo in xoog la adeegsado ama qof la xiro.
4) Farqada (3) ayaa lagu dabakhayaa marka qof ama ka badan si sax ah ay u magacaawdo Dawlad kale oo awood u leh, Wasaaradduna sidoo kale ayey u magacaabaysaa sarkaalka idman ee kaluumeysiga sida uu qabo sharcigan. Agaasimaha guud isaga oo la tashanaya maamulka dalka kale, waxa uu caddeynayaa in qofka ama shakhsiyaadka ay wasaaraddu awoodda u siisay in uu noqdo sarkaalka idman ee kalluumeysiga sida uu qabo sharcigan, waxaa kale oo uu Agaasimuhu caddaynaya ujeeddada aagga ama waqtiga loo cayimay sarkaalka, marka laga reebo in xoog wax loo taxaabayo.

Qodobka 94
Awoodda Gelista Iyo baarista

1) Ku dhaqmidda qodobkan waxa uu gaarsiisan yahay dhammaan howlaha hoos yimaada sharcigan meelaha uu khuseeyo.
2) Sarkaalka idman ee kalluumeysiga, ujeeddooyinka iyo hawlaha hoos yimaada sharcigan dartii, waxa uu awoodaa digiin la'aan in uu:
joojiyo, fuulo, saarnaado, galo oo baaro markab kasta, gaadiid ama diyaarad kasta, oo ay ku jiraan:
Markab kasta oo uu u heysto sabab uu rumeysan yahay in la isticmaalay, la isticmaalayo ama la rabo in lagu isticmaalo loona adeegsado kalluumeysi ama wax la xiriira;
markab kasta oo Soomaaliyeed oo ka baxsan biyaha Soomaaliya;
markab kasta oo aan dal ka diiwaan gashnayn oo ku sugan badaha sare; iyo
markab kasta oo lagu dabakho sharcigan, sharci kasta oo caalami ah, heshiis caalami ah ama hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah, baaritaankana waxaa ka mid noqon kara in la jabiyo ama la furo meel kasta oo wax lagu hayn karo sida; qol, kuntuneer ama meel kale oo wax lagu ururiyo oo markab dushiis ah, kaas oo sarkaalka idman ee kalluumeysiga uu u haysto sababo macquul ah oo lagu aamini karo inay ku jiri karaan dembi cad sida uu qabo sharcigaan;
Galo, oo baaro dhisme ama goob kasta, marka laga reebo dhismeyaasha loo isticmaalo sida guryaha la deggan yahay oo keliya, oo ay ku jiraan dhismayaasha ka tirsan ama la xiriira guri la deggan yahay asaga oo si macquul ah uga shakisan in loo isticmaalo hawlaha hoos yimaada sharcigan:
in uu galo ama fuulo sarkaalku isaga oo haysta sabab uu uga shakiyo in la heli karo dembi cad oo ka dhan ah Sharcigan; ama
inay lagama maarmaan tahay ama ay habboon tahay in la galo ama la baaro si loo hubiyo in sharcigan la fulinayo ama la fuliyey;
Joojiyo qofkasta oo baaro diiwaan kasta, maqaal kasta, kuntuneer kasta agab ama qalab kasta, ama kalluun kasta oo uu haysto qofkaas;
Ka gudbo meel kasta;
Kormeero howlaha soo dejinta iyo rar kala wareejinta, oo uu ka qaado muunado, sawirro, muuqaallo iyo dukumentiyo kaleba;
Weydiiyo qof si toos ah ugu hawlan hawl kasta oo ruqsad, oggolaansho ama fasax kale looga baahan yahay sida ku xusan sharcigan ama heshiiska caalami ah ama hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah in uu:
bixiyo macluumaad ku saabsan hawlaha uu hayo;
sheego in qofkaasi uu haysto ruqsad, oggolaansho ama fasax kale oo waafaqsan sharcigan iyo, haddii ay sidaas tahayna, in uu tuso baaraha ruqsada, oggolaanshaha ama fasax kale,
sheego magaciisa, taariikhda dhalashadiisa iyo meesha uu ku nool yahay;
ku diiwaangaliyaa buugga howlaha markabka taariikhda soo gelitaan saxiixaana buugga , uuna weydiiyo kabtanka markabka inuu saxiixo soo gelitaanka, ama inuu ku muujiyo khariirad ama dukumiinti kale barta uu markabku taagan yahay wakhtigaas iyo khariiradda noocaan oo kale ah ama dukumiinti kale oo waafaqsan;
weydiiyo qof kasta oo si toos ah xiriir ula leh markabka, gaariga, diyaaradda, dhismaha, xarunta, ama meel kale ama hawl kasta oo hoos imaanaysa sharcigan, si loo helo macluumaadka looga baahan yahay dhaqangelinta sharcigan.
Baaro wixii agab kalluumeysi ah, qalab ah, diiwaan ah ama dukuminti kale oo laga helo ama saaran markab, gaari, diyaarad, dhisme, goob ama xarun kasta, taas oo sarkaalku uu u haysto sabab uu ku aamino in loo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

isticmaalay, loo isticmaalayo ama loogu tala galay in loo isticmaalo wixii ku saabsan ama la xiriira hawl kasta oo u baahan ruqsad ama oggolaansho sida ku xusan sharcigan;
Baaro, tijaabiyo ama sababo in la baaro iyo / ama la tijaabiyo qalab kasta oo elektaroonik ah oo loo baahan yahay in uu saarnaado markab kasta ama loo isticmaalo ujeeddo kasta oo hoos imanaysa sharcigan, waxa uuna baari karaa dukuminti, diiwaan, maqaal, alaab, qalab, kuntuneer kasta, kalluun iyo wax walba oo laga helo gaadiidka dhexdiisa ama dushiisa.
3) Marka la rabo in la baaro dhismayaasha loo isticmaalo guryaha la deggen yahay, si waafaqsan Sharcigan, Sarkaalka idman ee kalluumeysiga, waxa uu baaritaan ku sameyn karaa oo keliya marka uu sito waaran maxkamadeed oo awood u leh, qodobada ku xusan qodobkan waa lagu dabaqi karaa hadii laga maarmaan noqoto.

Qodobka 95
Awoodda Baaritaanka Ama Codsiga Baaritaan Ka dhan ah Shaqsiyaad ka Howlgala Aag ka Baxsan Xeer-xeyndaabka Qaranka

Sarkaalka idman ee kalluumeysiga waxa uu;

baari karaa qof kasta, marka ay jiraan sababo macquul ah oo lagu rumaysan karo in qofkaas, si caadi ah ama sharci ah, uu si toos ah ama si dadban ula xiriiro markab ama hawl kasta oo aan waafaqsaneyn sharcigan meelaha ka baxsan awoodda dalka,
Ka codsan karaa Dowlad kale inay fuliso baaritaanada markab ama qof kasta, si caadi ah ama sharci ah, marka ay jiraan sababo macquul ah oo la rumeysan karo in markabkaas ama qofkaas uu ku lug lahaa kalluumeysi sharci darro, oo uu ku xadgudbay sharcigan, Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiis caalami ah.

Qodobka 96
Awoodda Qabasho, Xiritaan, kala Wareegid Macluumaad Iyo Sugidda Cadeymaha

1) Sarkaalka kalluumeysi ee u idman hawlaha iyo ujeeddooyinka hoos yimaada sharcigan;waa in uu
Baaro, qaado, xiro, ilaaliyo muunadaha, dukumintiyada, buugaagta hawl-maalmeedka oo ay ku jiraan buugaagta elektiroonigga ama macluumaad kale, ama nuqulo laga helo, markab kasta, dhismayaal, xarumo ama meel kale, oo aan ka ahayn dhismayaasha loo isticmaalo sida guri lagu noolaado, laakiin ay ku jiraan dhismayaasha qayb ka ah guri la deggan yahay oo loo adeegsado hawlaha ku xusan sharcigaan;
qaato nuqullo ama sawiro ka qaato diiwaan kasta, ujeedadeeduna tahan in uu la wareegi karo kana qaadan karaa wixii diiwaanno ah oo meesha ku keydsan, muddada ugu macquulsan oo xaaladdu ay saamaxdo;
Hadii lagama maarmaan ay noqoto wuxuu codsan karaa inuu dib u soo saaro , ama ku caawiyo sarkaalka kalluumeysi ee idman inuu u soo saaro diiwaan aan la isticmaalin, macluumaadka lagu keydiyey ama dukuminti lagu keediyey diiwaankaas.
Weydiiyo shaqsi kasta oo xiriirka ama xiriir muuqda la leh markab, dhismooyin, xarumo ama goob kale ama hawl kasta oo ku xusan sharcigan si uu u bixiyo macluumaadka suuragalka ay tahay in loogu baahdo la socoshada ama lagu dhaqangelinta sharcigan.
2) Marka sarkaalka idman ee kaluumeysiga uu su'aalo weydiinayo shaqsi ujeedaduna ay la xiriirto faqrada (1aad) xarafka (d) ee qodobkan, sarkaalku waxa uu:
U baahanayaa shaqsiga su'aalaha la weydiiyay in uu ka bixiyo sharaxaad ama macluumaad ku saabsan markabka, meesha, waxyaalo, habka kaluumeysiga, agabka, diiwaanka, dukumiintiga, nuqulo, aaladdo, ama wax kasta oo laxariira qaadashada, soo iibsasho, sii iibin, ama haysasho wax kasta oo kalluun; iyo
Wuxuu weydiin karaa in qofkaas ama qof kasta oo kale uu tuso fasax kasta, oggolaansho Wasaarad, ruqsad, shati, shahaado ama dukumiinti kasta oo loo soo saaray markab ama qof.

Qodobka 97
Awoodda Lagu Xirayo Dadka, Maraakiibta, Qalabka, Iwm

1) Sarkaalka idman ee kalluumeysiga waxa uu xiri karaa qof, markab, baakad, kartoon, diiwaan, dukumiinti, maqaal, agab, qalab, alaab, shey, kuntuneer, kalluun ama wax kale muddada ugu macquulsan ee ay suurtagal tahay in lagu baaro sida uu qabo sharcigan.
2) Marka markab ama gaari la xiro ama la xannibo, oo ay saarantahay qalabka kalluumeysiga iyo agab kale , waxaa ogeysiiska xannibaadaas ama amarkaas bixinaya Agaasimaha Guud waxaana lagu wargelinayaa

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

howlgeliyaha markabka ama baabuurka, nuqulka xanibaadana waxa uu degdeg ugu gudbinayaa wasaaradda ku shaqada leh ee dowladda Soomaaliya.

3) Marka la xiro ama la xannibo markab shisheeye, Agaasimaha Guud ayaa hubinaya in xariga markabka la ogeysiiyey waddanka uu calanka ka sito.

Qodobka 98
Awoodda Soo Qabashada

1) Sarkaalka Kalluumeysi ee ku shaqada leh, kaas oo heysta awood sharci oo uu wax ku xiri karo, haddii, asaga oo cuskanaya sababo macquul ah, uu u arko in qofi uu dambi galay ama uu ku xadgudbay qodob ka mid ah sharcigan, wuxuu:

a) Ku amri karaa in qofkaas uu si degdeg ah u joojiyo falkaas, ugana waantoobo.

b) Wuxuu weydiin karaa qofkaas sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada leh u sheego magaciisa, taariikhda dhalashadiisa, cinwaan halka uu deggan yahay iyo shaqadiisa, wuxuu kaloo weydiin karaa inuu soo raaciyo caddeymo la xariira xogta uu soo gudbiyay, hadba intii xaaladdu ogolaato.

c) wuu xiri karaa qofkaas ruqsad la'aan.

2) Haddii qofka la xiray uu ka shaqeynayay Markab laga leeyahay dal shisheeye, Agaasimaha Guud waa inuu ogeysiiyaa waddanka uu markabku calankiisa wato.

Qodobka 99
Awoodda Bixinta Amarka Dekad Kusoo Xirashada Markabka

1) Sarkaalka Kalluumeysi ee ku shaqada lihi wuxuu markabka ku amri karaa inuu dekadda kusoo xirto si loogu sameeyo baaris la xiriirta u hoggaansamidda sharcigan, ama sharciga u dhigma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiisyo kale oo calami ah.

2) Howlgeliye Markab kasta, kaasoo aan si dhaqsa ah ugu hoggaansamin amarka soo xirashada ama diida hannaanka baariseed ee dekaddaas ka jira wuxuu galay dambi, xukun ka dibna wuxuu muteysanayaa ganaaxa ku xusan Jadwalka ama xabsi aan ka badneyn shan sano; ama labadaba iyo wixii kale ee ciqaab ah oo uu sharcigani dhigayo.

Qodobka 100
Awoodda Tilmaan Bixinta

1) Sarkaalka kalluumeysiga ee ku Shaqada leh, kaas heysta sabab maangal oo uu ku rumeysan karo in markabkaas, iyo qalabka ama agabka kalluumeysi ee saaranba, loo adeegsanayo ama loo adeegsaday si ka soo horjeedda sharcigan, shuruudihii lagu siiyay ruqsad kalluumeysi, fasax ama oggolaansho kalaba, ama loo isticmaalay si ka soo horjeedda Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiis kale oo loo galay si waafaqsan sharcigaan:

a) Wuxuu sida ugu dhaqsiyaha badan oo suuragalka ah markabkan ugu kaxeyn karaa dekadda ugu dhow ee Soomaaliya si baaritaan loogu sameeyo ama wuxuu geyn karaa dekad ama meel kasta oo u fududeyn karta howlaha baariseed ee markabka lagu sameynayo, ayadoo muhiimad gaar ah la siinayo amniga markabka iyo shaqaalaha saaran.

b) Wuxuu markabkaas ku sii heyn karaa dekaddaas uu taagan yahay ilaa muddada suuralgalka ah ilaa uu sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uga gudan karo waajibaadka uu sharcigani saarayo, markaas oo markabka loo oggolaanayo inuu ka furto dekadda.

2) Markabka waxaa loo oggolaan doono inuu dekadda ka dhaqaaqo waqti macquul ah guddihiis laga billaabo markii uu soo xirtay, kolkaas oo Wasiirku, ka dib markii uu la tashado Xeer-ilaaliyaha Guud iyo saraakiisha kalluumeysi ee ku shaqada leh iyo sidoo kale Hannaanka Maareynta Kalluumeysi ee heer gobal, uu go'aansanayo in uu meesha ka baxay tuhunkii ahaa inuu markabku galay xadgudbka ku xusan farqadda (1) ee qodobkan

Qodobka 101
Qabasho Maraakiibta, Diyaaradaha iyo Agab kale

1) Sida sharcigani qabo, qalabka markabka, agabka kalluumeysiga, alaabtiisa, weelasha, keydka iyo rarkiisaba waxaa loo aqoonsan yahay qeyb ka mid ah markabka.

2) Sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi wuxuu qaban karaa:

a) Markab kasta ama gaadiid kasta oo kale, agabka kalluumeysi, weelasha, yeyga markabka loo isticmaalo, alaab, kunteenarro, badeeco, qalab ama wax kale oo sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu u

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in waxyaabahaas lagu geystay ama lagu talagalay in lagu geysto dambi lagu jebinayo sharcigan.

b) Kalluun kasta ama waxsoosaar kasta oo kalluun, kaas oo sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu u hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in la guranayo ama la gurtay, la dilay, la rartay, la soo gatay ama la iibiyay ama lagu helay qof u heysta si sharcigan baalmarsan ama la ogaaday inuu cudur qabo ama uunan ku habbooneyn in dadku quuto.

c) Xog walba, qoraal kasta, keyd walba ama walax kasta oo sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu u hayo sabab maangal ah oo uu rumeysto in ay caddeyn u noqon karto in lagu xad gudbay ama lagu gefay sharcigan ama sharci udhigma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah

d) Baasaboorka ama buug diiwaanka badmaax walba:

i. Oo ay leeyihiin kabtanka iyo shaqaalaha saaran markabka la amray inuu ku leexdo ama ku sugnaado dekedda si waafaqsan sharcigan ilaa iyo inta markabka loo fasaxayo inuu baxo;

ii. Qof kasta oo la xiro, ilaa iyo intii maxkamad laga horgeynayo ama

iii. Ayada oo la fulinayo amar maxkamadeed iyo;

e) Walax kasta oo kale oo sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu u hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto:

(i) in lagu galay ama imminka lagu howlan yahay in lagu galo dambi lagu jebinayo sharcigan;

(ii) loo la wareegay si sharcigan waafaqsan; ama

(iii) si sharci darro ah looga qaatay ciddii uu gacanteeda ugu jiray si sharcigan waafaqsan.

3) Sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi cid kasta iyo walax kasta oo uu u qabto si waafaqsan farac farqadeedyada kore ee qodobkan, wuxuu ku wareejinayaa; (2) Wasaaradda si ay ugu xafiddo si waafaqsan habraacyada sharciga ama ay ugu ilaaliso sida sharcigu qorayo ama hadba sida uu Agaasimaha Guudi tilmaamo.

4) Ogeysiis qoraal ah ayaa la siinayaa qofka laga qaaday qalabka ama sheyga la qabtay ama qofkii kale ee sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu aamin yahay inuu yahay milkiilaha alaabta ama uu sidiisa kale masuul uga yahay alaabta la qabtay, sababta qabashadana waa lagu caddeynayaa ogeysiiska.

5) Markii markabka la qabto, Agaasimaha Guud wuxuu hubinayaa in dalka markabka laga leeyahay si dhaqso loogu wargeliyo tallaabada la qaaday iyo ciqaabaha lagu soo rogay markabka.

Qodobka 102
Qeybo Ka Saaridda Qalabka Makabka La Qabtey

1) Sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi wuxuu awoodaa inuu ka saaro ama sababo in laga saaro qeybo ka mid ah markab loo qabtay si waafaqsan sharcigan, ayadoo loola jeedo in la dhaqdhaqaaq-tiro markabka.

2) Qeyb walba ama qeybo walba oo markabka looga saaro si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan waxaa loo heynayaa si bedqab leh, waxaana loo celinayaa markabka markii lasii deynayo.

3) Qofna, asagoo aan ku howlgaleyn amarka Agaasimaha Guud, looma oggola inuu;

a) hayo ama raadsado inuu hayo qeyb ama qeybo looga saaray markabka la qabtay si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan.

b) Haayo ama raadsado inuu hayo amaba uu beddel ku sameeyo ama uu walax kale ku doorsado qeyb ama qeybo ka mid ah kuwii markabka looga soo dejiyay si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan.

c) Ku xiro ama isku dayo inuu ku xiro markabka la xanibaad si waafaqsan qodobkan, qeyb ama qeybo ka mid ah kuwii laga saaray ama qeyb ama qeybo lagu beddelay kuwii laga saaray.

d) Qof kasta oo jebiya farqadda (3) ee qodobkan wuxuu galay dambi, wuxuuna xukun ka dib muteysanayaa ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano ama labadaba, iyo wixii kale ee ciqaab ah ee sharcigani qorayo.

Qodobka 103
Raacdeyn ama Ku-dabajir (Hot Pursuit)

1) Sarkaal kasta oo kalluumeysi oo ku shaqo leh, kaas oo tuhun cuskan sababo maangal ah ka qaba in markab shisheeye uu ku xad gudbay sharcigan; sharciga u dhigma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiis kale oo caalami ah, wuxuu sameyn karaa raad raacid oo uu ku soo qabanayo markabka shisheeye, ayadoo waafaqsan xaaladaha uu aqoonsan yahay sharciga caalamiga ahi, oo uu ku jiro xaaladaha uu tilmaamayo qodobka 111 ee Axdiga badaha ee Qaramada Midoobay (UNCLOS).

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Sarkaal kasta oo kalluumeysi ee ku shaqada leh oo fulinaya awoodaha ku xusan farqadda (1) ee qodobkan wuxuu wargelinayaa Agaasimaha Guud, kaasoo asagoo u maraya wasaaradda u qaabilsan Arrimaha Dibadda, wargelinaya waddanka uu markabku calankiisa sito.

3) howadeen markab kasta oo aanan u hoggaansami amarka lagu joojinayo ama diida awoodda sharci ee uu adeegsanayo kormeeraha kalluumeysi ama sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada leh, wuxuu gelayaa dambe uu xukun ka dib ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano ama labadaba iyo wixii kale ee ciqaab ah oo uu dhigayo sharcigani, wixii ruqsad ama fasax ah oo uu markabku heystayna waa la gala noqonayaa, dhammaan kalluunka iyo waxsoosaarka kalluun ee saaran markabkana waa lala wareegayaa.

Qodobka 104
Mas'uuliyadaha Kormeerayaasha

1) Mas'uuliyadaha kormeerayaasha waxaa ka mid ah:

a) U kuurgelidda, kormeeridda, ururinta, keydinta, qiimeynta iyo tebinta xogaha loogu baahan yahay sharcigan awggii oo ay ku jiraan, waxyaabo badan oo kale ka sokow, howl kasta oo loo qabtay si sharcigan waafaqsan, saameynta ay howsha noocaas ahi ku leedahay kalluumeysiga iyo kheyraad biyoodka kale iyo degaankooda iyo sharci ahaanshaha dhammaan wejiyada kala duwan ee howlahaas;

b) Muunad ama sawir ka qaadashada kalluunka la soo jillaabay ama waxyaabaha kale ee markabka saaran;

c) kormeeridda hirgelinta nidaamka maareynta iyo ilaalinta ee lagu dhaqaaqay ayadoo la fulinayo sharcigan, sharciga u dhigma ee xeerka maareynta iyo ilaalinta iyo heshiis kale oo caalami ah; iyo

d) Wixii kale oo mas'uuliyad ah ee sharcigani dhigayo, kuwaas oo loo baahan yahay si korjooguhu uu u guto waajibadkiisa.

2) Mas'uuliyadda kormeere waxaa kaloo ku jiri kara sameynta:

a) howlaha kale ee lagu hirgelinayo Hanaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ee Agaasimaaha Guud uu u xilsaaro kormeeraha;

b) Wixii kale ee howl ah oo Agaasimaaha Guud ka caawin kara helidda, daraaseynta ama hubinta xogta la xiriirta cilmiga kalluumeysiga, hadba intii Agaasimaha Guud uu u diro.

3) Waxaa lagu faafinaya Kormeerayaasha si waafaqsan tilmaamaha Agaasimaha Guud iyo Xeerkan ama heshiiskasta oo caalami ah ama Hanaanka Maaraynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la dabaqikaro wixii la xiriira markab kasta oo loo adeegsdo kalluumaysi ama badeeco isku wareejin ama rarid iyo dajin, ama wixii la xiriira howlokasta oo kale oo soo galaysa xeyndaabka Sharcigaan, gudaha iyo dibadda goobaha hoos yimaada xeer-xeyndaabka Qaranka Soomaaliyeed.

Qodobka 105
Kharashaadka Kormeeraha

1) kharashka ku baxaya kormeeraha qabanaya waajibaadka sharcigani saaray si gaar ah ayaa loo soo dallacayaa, waxayna ku dhacaysaa xisaab la yiraahdo "qidma kormeere", waxayna qeyb ka tahay kharashyada kale ee la soo dallaco, sida qidmada ruqsadda kalluumeysiga, qidmada fasaxa kalluumeysi, qidmada oggolaanshada iyo diiwaangelinta. Qidmada kormeeruhu inta ay noqoneyso iyo sida loo qaadayo waxaa go'aaminaya Wasiirka.

2) kharshka lagu xusay farqadda (1) ee qodobkan waxaa ku jiro, waxyaabo kale oo badan ka sokow:

a) Kharash caymiska kormeeraha oo dhammeystiran.

b) Mushaarka kormeeraha

c) Gunnada kormeeraha

d) Qalabka kormeeraha

e) Tabarka kormeeraha.

f) Dhammaan kharashyada la xiriira socdaalka lagu tegayo ama looga imaanayo markabka ama meeshii kale ee kormeeruhu uu ka howlgalo.

g) kharasyada ku baxa maamulka iyo maareynta kormeeraha, kaas oo u baahan in la horgeeyo oo ay ansaxiyaan Guddiga Maamulku.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

h) Haddii aan la dhiibin kharashka ku xusan farqadda (1) ee qodobkan, la bixin maayo ruqsadda iyo fasaxa kalluumeysiga; haddii la bixiyayna waa la hakaniyaa ama malahaaneyso saameyn sharci ilaa si buuxa loo dhiibo qidmadii kormeeraha, isla markaasna Agaasimaha Guud loogu diro ogeysiis qoraal ah.

Qodobka 106

Waajibaadka Ka Saaran Howlgeliyaha iyo Xubnaha Shaqaalaha Gacan-siinta Kormeeraha

1) Howlgeliye walba iyo mid kasta oo ka mid ah shaqaalaha markab lagu qoray kormeere waxaa laga rabaa, mar walba ha la jooga biyaha soomaaliya ama meel ka baxsane, waa in uu u oggolaado, kuna caawiyo kormeeraha gudanaya waajibaadkiisa, inuu:

a) Fuulo markabkaas

b) Siiyo kormeeraha goobshaqo oo ku habboon, una sii daayo meeshii uu rabo, una oggolaado adeegsiga qalabka isgaarsiinta ee markabka.

c) Helo ama diro farriimo, uu la xiriiro xeebta iyo maraakiibta kale asagoo isticmaalaya qalabka isgaarsiinta ee markabka.

d) Hubiyo in jiifka, raashinka iyo xushmadda uu heysto kormeeruhu ay la heer tahay midda ay heystaan saraakiisha kale ee markabka saaran .

e) Ka qaato sawirro howlaha kalluumeysiga oo uu ku jiro kalluunka, agabka kalluumeysiga, qalabka, dukumiintiyada, jaantusyada iyo wixii duuban; iyo inuu markabka kala dego sawirrada iyo muuqalada uu kormeeruhu qaaday ama in uu ku isticmaalo markabka korkiisa.

f) Ururiyo xogaha ku saabsan kalluumeysiga kuwaas oo laga yaabo in loogu baahdo dano la xiriira fulinta sharcigan iyo shurruucda la midka ah ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta; iyo

g) Uga dego markabka meeshii iyo goortii uu hadba u tilmaamo Agaasimaha Guud.

2) Howlgeliye ama xubin kasta oo ka mid ah shaqaale Markab si sharcigan waafqasan loo saaray kormeere wuxuu gelayaa dambi haddii uu xadgudbo qeyb ka mid ah faracyaraha farqadda (1) ee qodobkan, qeyb kastana waxaa loo aqoonsanayaa dambi gaar ah, wuxuuna xukun ka dib muteysanayaa ganaaxa ku qoran jadwalka koowaad ama xabsi aaney muddadiisu ka badneyn shan sano, ama labadooda oo la isugu daray; ama wixii kale ee ciqaab ah oo uu sharcigani dhigayo.

Qodobka 107

Wargalin Kormeeraha Lagu qoray Markabka

1) Inta aanan kormeere la saarin markabka, Agaasimaha Guud wuxuu sida ugu macquulsan u markabka kormeere saarayo ku wargelinayaa howlgeliye markabka ama ciddii kale ee heysata ruqsadda kalluumeysiga, fasax ama oggolaansho kale oo macquul ah.

2) Howlgeliyekii ku guuldarreysta in uu kormeeraha ku saaro markabka goortii iyo goobtii uu Agaasimaha Guud u tilmaamay wuxuu galay dambi, uu ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad, ayada oo ay u dheer tahay in lagala noqonayo ruqsadda kalluumeysi, fasaxa iyo oggolaanshihii kale ee hore loo siiyay.

Qodobka 108

Kormeerayaal Iyo Baarayaal Ku Howlgalaya Qorshaha Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga

1) Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa howlaha la xiriira qorshaha kormeere ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobaleed iyo ururinta xogo hubban oo la xiriira wixii lasoo jillaabtay iyo xogo cilmiyeed kale oo ku saabsan kalluumeysiga sinjiyada qaar iyo meelaha sida weyn looga dhaqangeliyay nidaamka Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobaleed.

2) Farqaddan dhexdeeda, "Kormeere" waxaa loola jeedaa qofkii waajibaadkiisa shaqo uu yaallo markabka dushiisa; "baare" waxaa loola jeedaa qofkii xogta ka ururiya dhulka markii markabka wax laga dejinayo.

3) Kormeeruhu, waxyaabaha kale ka sokow, wuxuu:

a) Qoraa oo uu ka warbixiyaa howlaha kalluumeysiga, wuxuuna hubiyaa barta uu markabku ku sugan yahay.

b) U kuurgalaa oo qiimeeyaa caddadda kalluun ee lasoo jallaabtay, asagoo kala saaraya inta sinji oo ay kooban yihiin iyo inuu baaro wixii la qubayo, kalluunka aan loo qasdin iyo cabirka Kalluunka.

c) Diiwaangeliyaa nooca agabka kalluumeysiga, cabirka isha, waxyaabaha kale oo uu isticmaalaayo howlgeliyeka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Ururiyaa xogta si ay raadraac ugu noqoto xogaha la geliyay diiwaanka markabka (sinjiyada kalluunka iyo caddadkiisa, miisaanka kalluunka nool iyo kan laga shaqeeyay iyo goobta, haddii ay suuragal tahay);

e) Qabanayaa howlaha kale ee saynis ee ay uga baahdaan Guddiga Sayniska ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobaleed.

4) Baaraha wuxuu xeebaha ku baarayaa kalluunka lasoo jillaabtay, asagoo isu eegaya kalluunka la helay iyo baaxadda doonta, agabka kalluumeysiga iyo jinsiyada la helay ama wuxuu qabanayaa howlaha kale ee saynis ee ay uga baahdaan Guddiga Sayniska ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobaleed.

5) Soomaaliya way ka dhaqangelayaan, waana laga fulinayaa xeerarka sirheynta xogta, siyaasadda iyo habraacyada ay ku fadhido habka macluumaad ururinta ee lagu sheegay Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinkka Caalamiga ah.

QEYBTA 3^AD
ILAALINTA IYO CAQABADAHA DADKA SHAQADA U IDMAN

Qodobka 109
Qeexidda Qofka Shaqaada U Idman

Qeybtan gudaheeda, "qofka idman" waxaa ka mid ah sarkaalka kalluumeysiga, kormeerayaasha iyo Baarayaasha Idman ee lagu magacaabay si waafaqsan sharcigan ama Barnaamijka Kormeer ee hoos taga Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta heer gobal.

Qodobka 110
Qaan Ka Dhowrista Dadka Idman

1) Dadka idman ama qof kasta oo saraakiisha kalluumeysi ee idman ka caawinaya qodobka qodobka 95(3), looma eedeyn karo, looma qaameyn karo, laguma sheegan karo wax ka dhashay howl, awood ama waajibaad uu sharcigani farayo oo ay gudanayeen ama howl uu sharcigani ka reebay oo ay ka baaqsadeen;

2) Intii markabka loo soo wado meel ka mid ah xeebaha Soomaaliya ayadoo la raacayo amar waafaqsan sharciagan:

a) Haddii uu dalbado in loo daayo gacankuheynta markabka, kabtanku asaga ayaa mas'uul ka noqonaya amniga markabka iyo cid waba oo dushiisa saaran ilaa uu markabku ka gaarayo halkii loo waday;

b) Wixii dhibaato ah ee dhaca intii markabka loo soo wado meeshii la geyn rabay, ha ahaato dhimasho, dhaawac, baadi maqan ama khasaaro kale, ma jirto wax laga weydiinayo sarkaalka kalluumeysi ee idman.

Qodobka 111
Ishortaaga Iyo U Hogaansamid La'aanta Sarkaalka Idman

1) Sharcigan gudihiisa erayga "fashilmid" waxaa loola jeedaa dadaal kasta oo aan miro dhalin natiijadii loo baahnaa.

2) Dambi ayuu galayaa qofkii:

a) Ku farageliya, handada, cabsigeliya ama ka hor istaaga sarkaalka idman gudashada waajibaadkiisa;

b) Ku fashilma ama ka horyimaada

i. Inuu sarkaalka idmani shaqadiisa u guto si haboon oo nabad ah

ii. Inuu qaado talaabooyin suurtagal ah ee loo baahnaa si loo hubiyo in sarkaalka idmani uu haysto amni ku habboon gudashada waajibaadkiisa.

c) Haddii kabtanku ama shaqaalahu markabka ay ku fashilmaan ama ka horyimaaddaan in sarkaalka idman u oggolaadaan ama ku caawiyaan gudashada waajibaadkiisa, adeegsiga awooddiisa iyo mas'uuliyaddiisa, oo ay ka mid tahay:

i. Inuu si nabad ku joogaa markabka dushiisa,

ii. Inuu helo madaxbannaani buuxda oo uu ku galo meeshii uu doono markabka gudihiisa, kuna isticmaali karo, kalluunka, agabka kalluumeysiga iyo qalabka kale ee markabka saaran oo ay ku jiraan qalabka hagista markabka iyo ka isgaarsiintiisa.

iii. Iuu u madaxbannaanaado helidda qoraallada kambiyuutarrada ku qoran iyo kuwa buugaagta ku dhigan ee markabka saran, oo ay ka mid yihiin buug diiwaaneedka markabka, khariiradda, dukumiintiyada iyo xogaha kale ee la xiiira kalluumeysiga;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

iv. Inuu qaato, cabbiro, ku keydsado markabka dushiisa ama kala dego markabka ee uu ku heystay muunadda ama noocyada kalluunka mid walba ka qaato muunad ayadoo looga baahan karo dano cilmibaariseed awgeed; iyo

v. Inuu markabka uga dego si nabdoon.

d) Ishortaaga ama ka horyimaado inuu oggolaado hantidhowrka, kormeerka, baarista ama cilmibaarista loo idmay si waafaqsan sharcigan;

e) Ku fashilmo ama ka horyimaado inuu u hoggaansamo tilmaaha sharciga ah ama diido codsiyada uu usoo gudbiyo sarkaalka idman inta uu fulinayo waajibaadkiisa, awooddiisa iyo mas'uuliyadiisa, oo ay ku jirto in uu baaro;

i. Meel kasta oo ay ku jirto agab/kalluu lasoo dajiyey, la dhoofiyey, kalluun beerista ama xarun ka mid ah meel wax lagu keydiyo ama looga shakiyey inay wax ku keydsan yihiin.

ii. Kalluun kasta ama wax soo saar kalluun, qalab kalluumeysi, qalab ama diiwaanada.

f) Ku fashilmo ama is hortaago inuu u hogaansamo tilmaamaha uu sharcigu siinayo, ama diido codsiga uu soo jeediyey sarkaalka idman, isagoo adeegsanaya awooddiisa sharci iyo waajibaadkiisa uu ugu baahan yahay helidda warbixinada.

g) Marka sarkaalka idmani uu ka codsado howlwadeenka inuu siiyo macluumaadka uu u baahan yahay, howlwadeenku bixiyo xog been ah, qaldan ama marinhabaabin ah oo la xiriirta waxyaalihii la weydiiyey.

h) Ka hor imaansho qabasho qof sharciga ku xadgudbay;

i) Faragaliyo, dib dhigo ama diido qabashada qof uu arko sarkaalka idman ama rumeysan yahay inuu galay dambi kasoo horjeeda sharcigan.

j) Iska dhigo sarkaal idman oo ka socda Wasaaradda Kalluumeysiga ama si cad u sheegto inuu yahay sarkaalka idman ee wasaaradda Kalluumeysiga.

k) Inuu inkiro, isaga oo ah howlwadeenka ugu sareeya ee markabka.

l) Haddii uu ku fashilmo howlwadeenka markabka codsiga ka yimid sarkaalka idman ee Wasaaradda kalluumeysiga, ee ah in uu markabka u kaxeeyo meel Soomaaliya ka mid ah ee uu sarkaalka idmani tilmaamay, ama uu ku fashilmo hubinta ammiga dhammaan inta markabka saaran;

m) Haddii uu laaluusho ama uu isku dayo inuu laaluusho sarkaalka idman ee wasaaradda kalluumeysiga.

n) Afduubo, gaarsiiya waxyeello jireed ama weeraro:

i. Sarkaalka idman oo gudanaya waajibkiisa shaqo ama adeegsanaya awood uu sharcigani siinayo; ama cawaaqib xumo ka dhalatay falkiisaas gurracan; ama

ii. Sarkaal kasta oo si sharci ah ugu shaqeynaya tilmaamaha sarkaalka idman ee Wasaaradda kalluumeysiga, ama gacanyarhiisa; ama cawaaqib xumo ka dhalatay falkiisaas gurracan; ama ku caawiya ama ku dhiirrigeliya qof ama dad kale in ay sidaas oo kale sameeyaan.

3) Qof kasta oo gala dambiga lagu xusay:

a) Xarfaha (a) ilaa (m) ee faqrada(2) ee qodobkan, wuxuu xukun ka dib muteysanayaa ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba, ama wixii kale ee ciqaab ah oo uu sharcigani dhigayo; ama

b) Xarafka (n) ee farqadda (2) ee isla qodobkan, wuxuu xukun ka dib muteysanayaa ganaaxa ku xusan Jadwalka Kowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale ee ciqaab ah ee sharcigani dhigayo.

QEYBTA "AD"

HABRAACYADA BAARAHA

Qodobka 112

Habraacyada Baarista Ka Hor Ruqsad Siinta Iyo Dejinta

Sarkaalka kalluumaysiga idman ama Baaraha, wuxuu fulinayaa ka hor ruqsad siinta iyo dejinta Baaris owgeed kormeerada noocaan ah, iyo fulinta habraacyo noocaas ah iyo dabaqidda ee heerarka uu xadidayo mid ka mid ah hanaanka ilaalinta iyo maaraynta caalamiga ah ee hirgalay, ama Urur Goboleedka Maaraynta Kalluumaysiga ee xiriirka la leh.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 113
Habraacyada Kormeerka Badda

Sarkaalka idman ee Wasaaradda Kalluumeysigu, asagoo leh ujeedo kormeer badeed, wuxuu sameynayaa kormeerro, fulinayaa habraacyo, wuxuuna hirgelinayaa nidaamka uu farayo habraaca si waafaqsan sharcigan, iyo sharciga la midka ah ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiisyo kale oo caalami ah.

QEYBTA 5AAD
HABKA LA SOCOSHADA MARKABKA IYO HABKA AQOONSASHADA TOOSKA AH

Qodobka 114
Habka La Socoshada- Farsamada Laga Rabo

1) Wasaaraddu ayaa oggolaanaysa Aallaadda habka la socosho ee lagu xiro Markabka si howlihiisa loo gula socdo si waafaqsan sharcigan, waxaana ka mid ah:

a) Habka lasocoshada markabka;

b) Habka lasocodka Aaladda elektarooniga ah;

c) Habka warbixinta elektrooniga ah;

d) Hab kasta oo kale ama tiknoolojiyad kasta oo kale oo ay Wasaaraddu dhaqangeliso si wax loo gula socdo, waxna loogu hago ama wax lagu sahmiyo si waafaqsan sharcigan.

2) Baahida farsamo ee loo qabo Aalad warqabad oo guurguurta, oo lagu xirayo Aaladdaas, waxaa tilmaamaysa Wasaaradda.

3) Howlwadeen aan u hoggaansamin dalabyada faarsamo iyo kuwa tiknoolojiyadeed ay amartey Wasaaraddu, oo ay ku jirto qalabaynteedu, ayadoo waafaqsan faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan, ee ku saabsan Aalad warqabad ee guurguurta oo lagu xirayo markabka, taasoo ruqsad, fasax ama oggolaansho kale iyo diiwaangelinba:

a) Aan weli loo sameyn waa la joojinayaa dhammaantood soosaaristooda

b) haddii la siiyayna, wuxuu galay dambi uu muteysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn hal sano; ama labadaba; oo ay u dheer tahay Wasiirka oo hakinaya, kala noqonaya shahaaddada diiwaangelinta, ruqsadda, fasaxa, ama oggolaanshada kale haddii uu Wasiirku heysto sabab maangal ah oo ku qancisa inuu howlwadeenku ku fashilmay u hoggaansamidda sharcigan.

Qodobka 115
Habka La Socodka Markabka- Waxa Laga rabo Howlwadeenada

1) Howlwadeen kasta oo markab oo raba in Wasaaraddu siiso ruqsad, asaga oo haysta ruqsad ku habboon oo aan dhicin ama oggolaansho kale oo sharcigan waafaqsan, haddii uusan marabkiisu ka hoos marin shuruudihii ay Wasaaraddu u dajisey ama aan si kale sharcigu u qeexin, Howlwadeenkaas wuxuu:

a) Markabka dushiisa ku rakibanayaa oo ku dayactiranayaa Aaladda warqabad oo guurguurta, asagoo waafajinaya shuruudaha sharcigani qorayo ama sidii kale ay Wasaaraddu fareyso ama ay dalbayso, waxaana la hubinayaa in qalabku si buuxda u shaqeynayo waqti walba;

b) U diiwaangelinayaa aaladda warqabadka ee guurguurta si waafaqsan qodobka (79), farqadiisa (1) ee sharcigan;

c) Hubinayaa in aaladda warqabadka ee guurguurta ay tahay mid aan tashwiish lagu furi karin, oo ay tahay nooc iska ilaalin karta oo ay qabato ama ay dirto warbixinada khaldan Meesha ay Aaladdaas ku sugan tahay, oo ay tahay mid aan wax laga beddeli karin shaqadeeda, ha la adeegsado gacan, hab elektaroonig ah ama si kalaba , ayada oo:

i. La dhigayo meel xafidan

ii. Lagu xirayo wax (ama loo yeelayo hab) sheegaya in la isticmaalay ama la isku dayay in la faragaliyey;

d) Si toos ah ugu gudbinayaa wasaaradda warbixinnada hoos ku sheeggan ugu yaraan sacaddiiba mar, ama waqtigii kale ee looga baahan yahay ama lagu amray markii la raaco ruqsad ama fasaxyada kale ee la siiyay;

i. Aqoonsiga markabka,

ii. Juquraafi ahaan barta uu markabka markaas taagan yahay (dhigaha, loolalka), khaladaadka bar tilmaameedku uusan ka badnayn 500 oo mitir, heerka kalsoonidu ay tahay 99%, ama wixii kale ee warbixin ah ee laga rabo marka la cego ruqsadda ama fasax shaqo ee la siiyay,

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

iii.Taariikhda iyo saacadda (oo lagu sheegay waqtiga UTC) oo waafaqsan barta la sheegay in markabku taagan yahay;

e) Hubinayaa in

i.Warbixinnada iyo farriimaha la socodka markabka aanan sinnaba loo beddelin;

ii.Anteennada aaladda warqabad ee guurguurta ayna sina u joogsan;

iii.Uuna sinnaba u kala go'in dabka uu helayo qalabka lasocodka ee dayax gacmeedka ku shaqeeya; iyo

iv.Aaladda warqabadka ee guurguurta aanan markabka laga furin.

2) Haddii ay cilad farsamo ku timaado ama ay shaqeyn weydo aaladda warqabad ee guurguurta, howlwadeenku wuxuu si dhaqso ah u soo wargelinayaa Wasaaradda, muddo saacad gudaheed ah oo ka billaabaneysa markii cilladu dhacday, oo:

a) haddii cilladu dhacday markabka oo weli dekadda taagan, Howlwadeenku waa in aanu markabka dekedda ka furan;

b) Haddii markabku uu badda ku jirana, howlwadeenku waa inuu afar iyo labaatan saac gudahood markabka ku geeya dekaddii Wasaaraddu amartay, muddadaas gudaheedana nus saac walba uu warbixin soo diraa, uuna u hoggaansamaa amarada la siiyey;

c) Uu bil gudaheed ku dayactiraa ama ku beddelaa aaladda, markaas ka dib howlwadeenka looma ogollaanayo inuu galo safar kalluumeysi, ayadoo aaladda aanan la dayactirin ama aanan la beddelin.

3) Howlwadeenku wuxuu u hoggaansamayaa, isla markaana hubinayaa in dhammaan shaqaalaha markabku ay u hoggaansameen shuruud walba ama faritaan walba oo uu soo jeediso ama ay dalbato Wasaaraddu ama ay u hoggaansamaan sharciga u dhigma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

4) Howlwadeen walba oo aan kasoo bixin shuruudaha laga doonayo ee ku qoran xarfaha (a), (b), (c), (d) ama (e) ee faqradda (1) ee qodobkan, xarfaha (a), (b) ama (c) ee faqradda(2) ee qodobka iyo faqradda (3) ee qodobkan, wuxuu galay dambi uu ku muteysan doono ganaaxa ku qoran Jadwalba Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale ee ciqaab ah oo sharcigani uu dhigayo.

5) Qof kasta, asagoo aan heysan sabab sharci ah, aaladda warqabad ee guurguurta ka dhiga mid aan shaqeyneyn ama khalkhaliya ama ku fura shucaac, taas oo sababta in aaladdii ay si iskeed ah ama si sax ah u shaqeyn weydo ama si waafaqsan sharuudihi ruqsadda ama si kale u waafaqsan sharcigan, wuxuu galay dambi uu ku muteysanayo ganaaxa ku qoran Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale oo ciqaab ah oo sharcigani dhigayo.

Qodobka 116
Habka Aqoonsiga Tooska Ah

1) Wasaaraddu waxay ka dalbaysaa howlwadeenka, ayadoo ka mid ah shuruudaha bixinta ruqsadda, fasaxyada ama oggolaansho kale, inuu markabka ugu xiro habka aqoonsiga tooska ah si waafaqsan tilmaamaha lagu sheegay cutubka 9, sidoo kalana xeerka 19 ee heshiishka caalamiga ah ee badbaadada nolosha badda korkeeda iyo in uu markabku si joogto ah warbixin u siiyo Xarunta Lasocodka Kalluumeysiga.

2) Qofkii ku xadgudba farqadda (1) ee qodobkani wuxuu galay dambi uu ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka yareyn hal sano; ama labadaba, ama wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo.

Qodobka 117
Xarunta La Socodka Kalluumeysiga

1) Wasaaraddu waxay hirgalinaysaa Xarunta Lasocodka Kalluumeysiga, taas oo lagu qalabeynayo kambiyuutarro lagu shubayo barnaamijyo si toos ah xogaha u nidaaminaya iyo xog-dire elektaroonig ah iyo qalab kale oo loogu talagalay la socoshada dhaqdhaqaaqa markabka, kaas oo xogtu kusoo dhaceyso oo duubaya, asagoo, waxyaabo badan oo kale ka sokow, isticmaalaya:

a) Aaladda lasocodka markabka, oo ay ku jiraan aalad lasocodka oo elektaroonig ah iyo aalad warbixineed elektaroonig ah;

b) Habka aqoonsiga tooska ah.

2) Xarunta Lasocodka Kalluumeysiga waxaa laga dhigayaa qol sugan, xiran oo u gaar ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

3) Qolka Xarunta lasocodka Kalluumeysiga waxaa geli kara oo kaliya qofkii shaqaale ah ee Wasaaraddu u oggolaato;

4) Liiska magacyada shaqaalaha loo oggol yahay in ay galaan Xarunta waxaa lagu dhejinayaa iridda qolka.

5) Agaasimaha Guud wuxuu qoraal ugu oggolaan karaa ciddii kasta ee kale oo uu rabo in ay gasho Xarunta waqtiyo gaara ah.

QEYBTA 6AAD

HANAANKA DEKADDAHA DALKA

Qodobka 118

Hanaanka Dekadaha Dalka ; Codisga iyo Fulinta

1) Qeybtani waxaa lagu dabbaqayaa:

a) Maraakiibta shisheeye iyo maraakiibta aan sidan calanka Soomaaliya ee raadinaya dekad ay kusoo xirtaan ama joogaan dekad ka mid ah dekadaha Soomaaliya, marka laga reebo maraakiibta konteynarrada leh ee aan sidin kalluunka, ama haddii ay kalluun sidaanna uu yahay mid laga raray dekadaha dalka, isla markaana ayna jirin sabab lagu tuhmo in markaabkaasi uu ku lugyeeshay dhaqdhaqaaq kalluumysi oo ka mid ah kalluumeysi sharci darrada ah ee "IUU";

b) Dadka, maraakiibta, diyaaradaha, dhismooyinka dekadaha ama gaadiid ama goob ku howlan ama si uun ugu xiran dhaqdhaqaaqyo howleed oo hoos imaanaya sharcigan.

c) Dhammaan kalluumeysiga ama howlaha la xiriira kalluumeysiga ee lagu taageerayo kalluumeysiga laga sameynayo:

i. Goobo ka mid ah Soomaaliya oo uu ka shaqeynayo sharciga Soomaaliya ama ku jira xadka Soomaaliya ay xaqa u leedahay;

ii. Goobaha ka baxsan xukunka Soomaaliya:

a. Muwaadiniinta Soomaaliyeed, oo ay ku jiraan maraakiibta iyo dadka, iyo dhammaan dadka saaran maraakiibtaas ama la macaamilkooda ama xiriirrada dhex maraya ayaga ama xiriirrada ay la yeelanayaan dadka markabka saaran.

b. Wixii kale ee loo baahdo oo waafaqsan sharcigan, heshiis caalami ah, sharciyada u dhegma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

c. Si kale loola xiriirinayo howlo kalluumeysi oo sharci darro ah, aan laga warbixin oo aanan laga heshiinin ama lala xiriirinayo dhaqdhaqaaq kalluumeysi oo lagu taageerayo kalluumeysiga waafaqsan sharciga caalamiga ah.

2) Qoddobada qeybtan waxaa dadka loogu xukumayaa si caddaalad ah.

3) Marka la dhaqangeliyo qodobbada qeybtan, Wasaaraddu waa inay hubiysaa in sida ugu haboon ee suurtagalka ah loo isticmaalay aaladda elektaroonig ah ee hannaanka dekadaha dalka oo loo adeegsanayo xeerka maareynta kalluumeysiga ee heer gobaleed.

Qodobka 119

Dekad U Cayimid

Wasaaradda ayaa hubinaysaa:

a) In dekadda ama dekadaha uu markabku soo codsaday in uu kusoo xirto loo ogolaadey, lana faafiyay;

b) in liiska magacyada dekadaha ee loo qoondeeyay si waafaqsan farqadda (a) ee qodobkan, la siiyay hay'addaha caalamiga ah ama hay'adda Goboleedka maareyn kalluumeysi, ayadoo la raacayo Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

Qodobka 120

Ogolaanshaha Ka Horeeya Soo Gelidda Iyo Isticmaalka Dekadda

Howlwadeenka Markab shisheeye kuma xiran karo ama ma adeegsan karo dekad Somomaaliyeedd ilaa:

a) Dekad loo qoondeeyay, loona faafiyay si waafaqsan qodobka 110, dekadda la qoondeeyo, lana faafiyo;

b) Uu Howlwadeenku dalbaday dekad ku xirasho, xogtaasna loo gudbiyey sida ay tilmaamtay ama ay codsatay wasaaradda 72 saac ka hor soo xirashada, markab haysta ruqsad ama fasax uu uga kalluumeysto biyaha Soomaaliya 96 saac ka hor soo xirashada ama muddo intaas ka yar haddii wasaaraddu oggolaato, oo ay ku jirto ujeeddooyin dejin, rar kalluun ama wax soosaar kalluun;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Haddii Wasaaraddu oggolaato gelitaanka markabka ee dekadda, ayna hubiso in oggolaanshahaasi uu gaaray madaxa markabka ama wakiilka markabka ee Soomaaliya;

d) Markii markabku yimaado dekadda, oo madaxa markabka ama wakiilka markabku uu warqadda oggolaanshaha gelidda dekadda tuso qofkii wasaaraddu u wakiilatay in uu qabto warqadaas.

Qodobka 121
Diidmada Gelidda Iyo Adeegsiga Dekadda

1) Wasaaraddu, haddii caddeyn ku filan u hayso in markabka raadinaya in uu soo galo dekad ka mid ah dekadaha Soomaaliya uu ku lug yeeshay kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama uu ku howlanaa dhaqaaq kalluumeysi oo lagu taageerayo kalluumeysiga sharci darada ah, gaar ahaan marka markabka hore loogu daray liiska maraakiibta sameysa kalluumeysiga sharci darada ee IUU-ga;

a) Wuxuu markabkaas ka joojinayaa in la siiyo oggolaansho uu dekadda ku galo, wuxuuna u diidayaa inuu soo galo dekadda.

b) si ka duwan sida ku qoran xarafka (a) ee faqrada (1) ee qodobkan, wuxuu markabka noocaas ah u oggolaan karaa inuu galo dekadda kaliya markii lagu sameynayo baaritaan ama laga qaadayo tallaabooyin kale oo wafaaqsan sharciga caalamiga ah, kaas oo ugu yaraan la macno ah kan diidmada dekad soo gelidda, marka laga hadlayo ka hortagga, weecinta ama tirtiridda kalluumeysiga sharci darrada ah (IUU) iyo dhaqdhaqaaqyada kalluumeysi ee caawinaya kalluumeysiga sharci darada ah.;

c) Wuxuu wixii go'aan ah ee uu ku xusan xarfaha (a) ama (b) u gudbinayaa:

i. Howlwadeenka Markabka ama ciddii wakiil ka ah,

ii. Wasaaradda Dekadaha iyo Gadiidka Badda, kuwaas oo fulin doona go'aanka Wasaaradda.

2) Wasaaraddu waxay gelitaanka iyo adeegsiga dekadda u diidi kartaa Markab kasta oo ay u hayso sabab maangal ah oo loo qaadan karo inuu markaabkaasi ku xadgudbay sharcigan, waxayna go'aankeeda u gudbinaysaa dadka ku xusan xarafka (c) ee farqadda (1) ee qodobkan;

3) Haddii uu markab u diido gelitaanka iyo adeegsiga dekadda asagoo cuskanaya xarfaha (a) ama (b) ee faqradda (1) ama faqradda (2) ee qodobkan. Wasaaraddu waxay go'aankeeda u gudbinaysaa howlwadeenka markabka, dalka uu markabku calankiisa sito, maamul gobaleedka ay ku taallo xeebta dalka Soomaaliya ee markabka loo diiday, hay'ad Goboleedka Maareynta kalluumeysiga oo ay khuseyso ama hay'adaha kale ee caalamiga ah.

Qodobka 122
Masiibo Dabiici Ah iyo Dhib Culus

1) Sharcigani ka horjoogsan maayo markabna inuu kusoo xirto dekadda markii ay jirto wax sharciga Soomaaliya u aqoonsan yahay masiibo dabiici ah ama dhibaato culus, inkastoo aan:

a) La aqbaleyn sheegashada masiibo dabiici ah ama dhibaato culus, haddii:

i. Ay tahay masiibadu mid la buunbuuniyey/ laga badbadiyey, been ah ama si ula kac ah loo abuuray; ama:

ii. Ujeeddadeedu tahay in looga baxsado mas'uuliyad, qofkii la yimaada sheegasho aan raad laheynna wuxuu gelay dambi;

b) Culyska ah in la caddeeyo in sheegashada jiritaanka masiibo dabiici ah ama dhibaato culusi ay tahay mid sharci ah, oo ayna ka mid aheyn kuwa lagu diiday xarfaha (a) ee farqadda (1) ee qodobkan, wuxuu saaran yahay howlwadeenka markabka;

c) Sarkaalka kalluumeysi ee u idman ama sarkaal kale oo la awood ah ayaa kori kara markabka mar walba, si loo hubiyo sheegashada jiraanka masiibo dabiici ah ama dhibaato culus;

d) Markabkii sheegta jiritaanka masiibo dabiici ah ama dhibaato culus waxaa taladiisa la wareegaysa Wasaaradda.

2) Wasaaraddu waxay si waafaqsan sharcigan u siin kartaa fasaxa gelitaanka dekadda Markab ay qabsatay masiibo dabiici ah ama dhibaato culusi, haddii la helo in:

a) Markabka sheeganaya masiibo dabiici ah ama dhibaato culus uu soo gelayo dekadda, uuna sii joogayo kaliya ilaa laga xallinayo dhibaatada uu sheeganayo.

b) Markabka loo oggolaanayo gelitaan dekadda kaliya markii uu caawimaad u fidinayo dad ama Markab khatarta galay ama ay dhibaato qabsatay.

3) Howlwadeenka markabka loo oggolaado inuu dekadda ugu soo xirto si waafaqsan xarfaha (a) ama (b) ee faqradda (2) ee qodobkan, uma baahnaana inuu oggolaado inuu markabkaasi ku lugyeesho adeegga dekadda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

4) Howlwadeenka Markabka ee soo gudbiyay cabashada ku xusan xarafka (a) ee faqradda (1) ee qodobkan ama aan u hoggaansamin shuruudaha ku qoran faqradda (3) ee qodobkan, wuxuu galay dambi uu ku muteysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale ee ciqaab ah ee uu sharcigani dhigayo

Qodobka 123
U Diidid Adeegsiga Dekadda Soo Gelitaanka kadib

1) Markab loo oggolaaday soo gelitaanka dekadda si waafaqsan qodobka 111, xarfaha (c) iyo (d) uu kusoo xirto dekadda, Wasaaraddu waxay u diidi kartaa markabkaas inuu helo adeegga dekadda haddii:

a) Uusan markabkaas haysan oggolaansho ama ruqsad uu ku kalluumeysto ama uu qabto howlo la xirrira kalluumeysi oo uu bixiyay:

i. Dalka uu calankiisa sito;

ii. Maamulka uu sharcigiisu ka shaqeeyo xeebta uu ka kalluumeysanyo;

b) Ay caddaato in kalluunka markabka saaran la soo jillaabtay si baalmarsan sharciga waddanka ay ku taallo xeebta laga kulluumeysanayo;

c) Dalka markabka uu calankiisa sito uusan muddo kooban ku xaqiijin, sida Wasaaraddu codsatay, in kalluunka markabka saaran loo soo jilaabtay si waafaqsan shuruudaha Urur Goboleedka Maamulka Kalluumeysiga; ama

d) La hayo sababo maangal ah oo lagu rumeysan karo in markabkani uu ku lug lahaa kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama howlo kalluumeysi oo taageeraya kalluumeysi sharci darro ah (IUU), ilaa uu howlwadeenka ama kireystaha markabku ka caddeynayo in:

i. uu howlwadeenku si wafaaqsan sharciyada la xiriirta Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga;

ii. Haddii uu badda ugu geynayay shaqaale, shidaal, agab kalluumeysi ama saad kale, uuna markabka loo geynayay saadku uusan, markii la siinayay, aheyn Markab ku howlan kalluumeysi sharci daro ah (IUU);

2) Ayadoo aan waafqasanayn faqradda (1), Wasaaradda:

a) Uma diidayso markabka inuu helo adeega dekadda:

i. Haddii adeeggaasi uu lama huraan u yahay samata bixinta shaqaalaha markabka ama badbaadada markabka, waa haddii si dhab ah loo hubiyey jiritaanka baahidaas; ama

ii. Haddii markabka laga bedelayo biro duugoobay;

b) Haddii uu u diido adeega dekadda, Wasaaraddu waxay go'aankeeda wargalinaysaa dalka uu markabku calankiisa sito, dalka uu markabku xeebtiisa joogo ama Urur Goboleedka Maareynta kalluumeysiga ee ay khuseyso ama hay'ad kale oo caalami ah.

3) Haddii adeegga dekadda loo diido si waafaqsan sharcigan, Wasaaraddu oo la tashanaysa xafiiska xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, wuxuu:

a) Ka noqonayaa diidmada uu markabka saaray kaliya haddii caddeyn ku filan loo helo in sababihii loo cuskaday diidmadu ay ahaayeen kuwa kala dhimman ama khalad ahaa ama ayna sababahaasi xilligan dhaqangal ahayn;

b) Ka noqoshada diidmada ayaa si degdeg ah lagu wargelinayaa cid kasta oo si sharcigan waafaqsan oo la wargaliyey markii hore.

Qodobka 124
Baaris Ku Sameynta Maraakiibta Dekadda Taagan

1) Wasaaraddu waxay hubinaysaa in baarista markabka loo sameeyay si ka jawaabeysa ujeeddooyinkii laga lahaa sharcigan ama ugu yaraan heer la isla oggolaan karo in ay waafaqsan tahay Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

2) Wasaaraddu waxay kala hormarinaysaa baarista maraakiibta, asagoo tixgelinaya arrimahan:

a) Maraakiibta soo gelitaanka iyo adeegsiga dekadda loogu diiday si waafaqsan Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee ayaga khuseeya;

b) Codsi ka yimid dal kale ama Urur Goboleedka Maareyn kalluumeysi, kaas oo lagu dalbanayo in la baaro Markab, gaar ahaan markii ay codsiga la jirto caddeyn muujineysa in markabka laga hadlayo uu ku lug yeeshay kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama howlo kalluumeysi la xiriira oo lagu taageerayo kalluumeysiga sharci darrada ah (IUU); iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Haddii la hayo caddeyn buuxda oo lagu tuhmi karo in markabkaan uu ku lug yeeshay kalluumeysi sharci darro ah ama dhaqdhaqaaq kale oo lagu taageerayo howlahaas.

3) Wasaaraddu waxay, intii suuragal ah, hubinaysaa in la baaro markabkii laga helo shuruudaha ugu yar ee keeni kara in la baaro ee uu dhigayo nidaam walba oo maamul iyo ilaalineed oo ku habboon.

4) Inta ay baaristu ku socoto markabka dekadda taagan, sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi wuxuu hubinyaa in howlaha baaristu ay u socdaan sidii ay u soo qortay ama ay u tilmaamtay Wasaaraddu, wuxuuna warbixinta oo qoraal ah u dirayaa madaxda Wasaaradda.

5) Howlwadeenka markabka baaristu ku socoto wuxuu sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada leh siinayaa wixii taageero iyo xog ah ee loo baahan yahay; uuna u soo gudbiyo wixii agab ama dukumiinti ah ee uu ka dalbado ama nuqullada wixii ruqsad ah oo uu haysto.

6) Wasaaraddu waxay hubinaysaa in natiijadii kasoo baxda baaritaanka la sameeyay oo sharcigan waafqsan loo gudbiyo:

a) Dalka uu markabka calankiisa sito;

b) Haddii ay ku habboon tahay, haya'addii lala galay heshiis caalami ah oo arrintan khuseeya;

c) Dalka xeebtaas ka taliya iyo dalka uu kabtanka markabku dhalashadiisa haysto;

d) Urur Goboleedka Maamulka kalluumeysiga ay khuseyso;

e) Iyo ururradii kale oo calami ah ee ay khuseyso.

7) Howlwadeenkii aan u hoggaansamin ama aan shaqaalihiisa farin in ay u hoggaansamaan faqradda (5) ee qodobkan, wuxuu galay dambi uu ku mutaysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo.

Qodobka 125
Baarista ka Dib,Diidmada Adeegsiga Dekadda

1) Haddii baarista ka dib, la helo sababo maangal ah oo lagu rumeysan karo in markab uu ku lug yeeshay kalluumeys sharci darro ah ama howlo lagu taageerayo kalluumeysiga sharci darada ah, Wasaaraddu waa in ay:

(a) Si degdeg ah caddeymaha lagu helay markabka u wargeliso Dalka Calanka, ama Dal-Xeebeedka, Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga , ururrada caalamiga ah ee kale ee ay khuseyso iyo dalka uu kabtanka markabku dhalashadiisa haysto;

(b) Sababeysaa diidmada isticmaalka dekad ee markabka hadii aan hore loogu fulin amar diidmo.

2) Iyada oo uu jiro xarfka (b) faqradda (1) ee qodobkan, Wasaaraddu, waa in aanu u diidin markabka adeegga dekadda haddii adeeggaasi uu lama huraan u yahay samata bixinta nolosha iyo caafimaadka shaqaalaha iyo badbaadada markabka; maraka la hubiyo jiritaanka baahidaas.

Qodobka 126
Mamnuucidda Adeegsiga ama Gacansiinta Adeegsiga Dekadda Diidmada kadib

1) Haddii Markab:

a) Uu dekadda u joogo si khilaafsan:

i.Shuruudaha lagu sheegay qodobka 122;

ii.Diidmo fasax dekad gelitaan oo waafaqsan xarafka (a) qodobka 123 ama faqradda (2);

b) Loogu oggolaaday inuu dekadda ugu soo xirto si gaar ah oo ujeeddadeedu ay tahay:

i.baaritaan waafaqsan xarafka (b) faqradda (1) ee qodobka 123;

ii.Gargaar u fidin dad ama marakab khatar ku jira ama dhibaato culus heysato sida uu qabo qodobka 124; ama

c) Aan weli loo oggolaan ama loogu diiday adeegsiga dekadda si waafaqsan xarafka (b) faqradda (1) ee qodobka 123; xarafka (b) faqradda (2) ee qodobka 124; faqrada (1) ee qodobka 125 ama xarafka (b) ee faqradda (1) qodobka 127;

Cidna, oo uu ku jiro hawlwadeenka markabka ama shaqaalaha markabka ama cid kasta oo kale oo si dadban ama si toos ah xiriir u leh markabkaasi, ma sameyn karto arrimahan soo socda:

d) Ma sababi karto ama uma oggolaan karto markabka inuu dekadda usoo galo si ka baxsan xarafka (a)(1);

e) Kuma lug yeelan karto, ma fududeyn karto, oo cidna kalama qeybgeli karto adeegsiga dekaddaas;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

f) Uma oggolaan karto, ugu mana caawin karto markabkaas, si dadban iyo si toos ahba, inuu helo adeegga dekaddaas;
Ilaa oggolaansho qoraal ah laga helo Wasaaradda ku shaqada leh adeegyada dekeda si loogu isticmaalo samata bixinta iyo caafimaadka shaqaalaha ama loo badbaadiyo markabka si waafaqsan sharcigan, dekaddana waxaa loo isticmaali karaa kaliya ujeddooyinkaas aan soo sheegnay.

2) Qof kasta oo jebiya xarfaha (d), (e) ama (f) ee faqradda (1) ee qodobkan, wuxuu galay dambi uu ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad, ama xabsi aan ka badnayn shan sano; ama labadaba; ama wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo, haddii howlwadeenka markabku uu dambiga galayna waxaa lagala noqonayaa ruqsadda markabka.

Qodobka 127
Shuruudaha laga Rabo Maraakiibta Soomaaliyeed

1) Howlgeliyeka markabka Soomaaliyeed waxaa laga rabaa in:

a) Uuna gelin dekad shisheeye asagoo aan dekaddaas codsi usii diran 72 saacadod ka hor gelitaankiisa, isla markaasna aan wadan oggolaansho rasmi ah oo uu bixisay wasaaraddau ama wasaarad awood u leh ee dekada dalka;

b) Uu si buuxda ula shaqeeyo baaritaannada ay sameynayaan dekadaha dalalka kale si waafaqsan sharcigooda iyo habrraacyadooda; iyo

c) Uuna ku lug yeelan wax ku saabsan adeegsiga dekaddaas, oo ay ka mid yihiin kusoo xirashadeeda, wax ka rariddeeda, wax ka baakadeynteeda ama kalluun ku habbeynteeda, haddii dekaddaasi ay tahay dekad dal; taas oo Ururuka Maareynta Kalluumeysi ee Gobalka oo ku shaqo leh u aqoonsaday mid aan u hoggaansamin ama aan u dhaqmin si waafaqsan nidaamyada caalamiga ah iyo kuwa goboleedyada ee ayada khuseeya iyo Hanaanka Daaryeelka iyo Maareynta caalamiga ee la xiriira hanaanaka dekadaha dal.

2) Haddii ay jirto sabab cad oo lagu rumeysto in markabka Soomaaliyeed uu ku lugyeeshay kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama uu galay howlo kalluumeysi la xiriira oo lagu caawinayo kalluumeysiga noocaas ah, Agaasima Guud wuxuu sida ugu habboon uga codsanayaa dalkaasi in uu baaro markabkaas ama ay ka qaadaan tallaabooyin waafqasan nidaamyada caalamiga ah iyo kuwa gobaleed ee ku habboon.

3) Haddii baaritaanka ay sameysay dekadda dalka kale ay kasoo baxdo sabab cad oo lagu rumeysto in markabka Soomaaliyeed uu ka qeybgalay kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama uu sameeyay howlo kalluumeysi la xiriira oo lagu taageeray kalluumeysiga noocaas ah (IUU), Agaasimha Guud wuxuu sababeynayaa in arrinta si degdeg ah oo buuxda loo baaro, haddii caddeyn ku filan loo helana wuxuu sababeyanyaa in si degdeg ah loo qaado tallaabooyin fulineed oo waafaqsan sharcigan.

4) Howlwadeeka markab Soomaaliyeed oo kasta ee jebiya tuducyaraha (a), (b), ama (c) ee farqadda (1) ee qodobkan wuxuu galay dambi uu ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan (5) sano; ama labadaba, ama wixii kale ee ciqaab ah oo sharcigani dhigayo, ruqsadaha markabkana waa la laalayaa.

QEYBTA 7AAD
QODOBBO KALA DUWAN

Qodobka 128
U Qaadashada Kalluumaysiga Sharcidarrada Ah Mid Ka Hor Imaanaya Hanaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah

1) Howlwadeenka markabka waxaa loo qaadanayaa inuu sameynayo kalluumeysi sharci darro ah ama howlo la xiriira, oo ka hor imanaya Hanaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga , haddii markabku uu:

a) ku howlanaa kalluumeysi ama howlo kalluumeysi la xiriira, asagoo aan ku qorneyn diiwaanka maraakiibta loo oggol yahay in ay jillaabtaan noocyo ka mid ah kalluunkaas ama aan lagu diiwaan gelin Liiska Maraakiibta Ka-howlgala;

b) Ku lug yeeshay kalluumeysi ama howlo la xiriira kalluumeysi ayadoo dalka uu calankiisa sito uusan ka mid ahayn dalalka saamiga ku leh, qoondo kalluumeysi oo uu siinayo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee gobolkaas ka jira, ilaa uu qaato calanka dal xubin ka ah kuwa saxiixay xeerkaas ama iskaashi la yeeshay asagoon xubin ka aheyn heshiiskaas;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Ku guuldarreystay inuu qoro ama warbixin ka diyaariyo kalluunka uu ka jillaabtay si waafaqsan hannaanka maareynta iyo ilaalinta ee halkaa ka jira; ama uu diyaariyay warbixin been ah;

d) Qaatay ama dajiyey kalluunka aan gaarin heerka qabashada ;

e) Ku dhaqaaqay kalluumeysi ama howlo kalluumeysi la xiriiri xilli kalluumeysigu xiran yahay ama galay meelo uu kalluumeysigu ka xiran yahay;

f) Adeegsaday agab kalluumeysi oo mamnuuc ah;

g) Kalluun ku wareejiyey; ama si kale howlo wadajir ah ula qabtay, caawiyay ama sahay siiyay Markaakiib aan ku jirin liiska kuwa kalluumeysiga loo fasaxay ama aan ka mid aheyn kuwa loo oggol yahay in ay badda dusheeda kulluunka kula wareegaan;

h) Uga kalluumeystay ama uga fuliyay howlo kalluumeysi la xiriira meel ka mid ah biyaha Soomaaliya si khilaafsan sharcigan ama ka hor imanaya shuruucda dalka ay ku taallo xeebta uu ka kalluumeysanayo;

i) Ku dhaqaaqaya kalluumeysi ama howlo kalluumeysiga la xiriira asagoo aan dal ka diiwaan gashnayn;

j) Sameeyay kalluumeysi ama howlo la xiriira, asaga oo wata ruqsado si ula kac ah loo been-abuuray ama loo qariyay summadihii markabka, aqoonsigii diiwaangelinta; ama

k) Uu kalluumeystay ama ku dhaqaaqay howlo kalluumeysi la xiriira si ka soo horjeedda hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee ku habboon;

Wasaaaraddu waxay xog iyo caddeymo u gudbinaysaa Urur Goboleedka Maareynta Kulluumeysiga goobta uu markabku ka sameeyay ama uu hadda ka wado hawlo loo malaynayo in ay la xiriiraan kalluumeysi sharci darro ah ;

2) Ayadoo la tixraacayo faqrada (1) waxay qabaneysaa markab kasta oo biyaha Soomaaliya jooga ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo jooga meel ka baxsan biyaha xeer xeyndaabka Soomaaliya ay maasmusho.

3) Ayadoo aan waafaqsaneyn faqradda (2), haddii loo qaato in markab ku sugan biyaha Soomaaliya uu si uun ugu lug yeeshay kalluumeysi sharci darro ah ama howlo la xiriira kalluumeysigaas ama uu ka galo howshaas meelo ka baxsan soohdin biyoodka Soomaaliya halkaas oo uu ka jiro Urur-Gobaleedka Maareynta Kalluumeysiga oo ay Soomaali xubin ka tahay, howlwadeenka markabkaas waxaa loo qaadanayaa inuu galay dambi sida uu qabo sharcigani.

4) Howlwadeen kasta ee markab, kaas oo loo aqoonsaday inuu ku lugyeeshay kalluumeysi sharci darro ah ama howlo la xiriira, wuxuu galay dambi uu ku muteysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka yareyn shan sano; ama labadaba, ama wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo; sidoo kale wixii ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelinta Markabka la siiyay waa la lagala noqonayaa.

CUTUBKA 9-AAD

AWOODDA GARSOORKA, HABRAACA IYO MASUULIYADAHA

Qodobka 129

Garsoorka Iyo Heerarkiisa

1) Eedeyn walba oo la xiriirta fal ama fulin la'aan ku saabsan sharcigan, taas oo ka kooban xadgudub lagu sameeyay sharcigan, oo lagu galay biyaha Soomaaliya ay maamusho ama ay ku leedahay xuquuq qaanuuni ah, waxaa dacwadiisa lagu qaadi karaa maxkamad degmo, maxkamad gobal ama maxkamaddii kale ee awood u leh, ayadoo la marayo habraacyada shuruucda Soomaaliya, dhammaan dacwadahaasna waxaa loo aqoonsanayaa in ay yihiin dacwado Madani ah:

2) Haddii eedeynta lagu xad-gudbay ama fulin la'aanta sharcigan khuseysa, oo sheegeysa in sharcigan lagu xad-gudbay ay ka dhacday meel ka baxsan soohdin biyoodka Soomaaliya, Maxkamadda Sare ayaa tilmaameysa halka lagu qaadayo dacwaddaas.

3) Haddii qofka shaqada loo idmaday oo loo soo magacaabay si waafaqsan sharcigan uu asagoo adeegsanayo awoodaha ama ku gudanayo waajibaadka sharcigan uu u siinayo in meel ka baxsan biyaha Soomaaliya uu la kulmo qof lagu eedeynayo fal ama gaabis uu ku xad-gudbay sharcigan, waxaa falkaas iyo ka gaabiskaas sharcigan loo qaadanayaa inuu ka dhacay gudaha soohdin biyoodka ay maamusho Maxkamadda Sare sida ku xusan faqrada (1).

4) Maxkamadda Sare ee Federaalku markay dacwada qaadeyso waxay ka dooneysaa sarkaalka kalluumeysi ee idman ama sarkaalkii kale ee gudanaya waajibaad ka dhashay sharcigan, ama heshiis kale oo calami ah oo la xiriira, ama Hanaanka Ilaalinta iyo Maareynta Caalamiga ah ama Hay'ad Goboleed Maareyn Kalluumeysi inuu bixiyo wixii caddeyn u ah fal dambiyeed ama ka gaabis fulin sharci ee:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

a) Ka dhaca meel ka mid ah soohdin biyoodka ay ka taliso maxkamadda Sare, sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan;
b) Uu ku qaadi karo sharcigan ama sharcigii kale ee Soomaaliyeed; ama
c) Xadgudub ku ah heshiiskii ruqsadda lagu bixiyay, heshiis calaami ah ama Hanaanka Ilaalinta iyo Maareynta Caalamiga ah oo ay degsatay Urur Goboleedka Maareyn Kalluumeysi oo uu ka howlgelayo sarkaalka kalluumeysi ee idman ama qofkii kale ee loo diro .
Hasa yeeshee sarkaal idmani aanu haysan dhalasho ama degganaansho goobta shaqada loogu direy

Qodobka 130
Masuuliyadda ka Dhalanaysa Bixin La'aanta Ganaaxyada Lacageed

Ayadoo la raacayo xadiga la isku dacweyn karo, lagu go'aaminayo, lagu meelmarinayo ama lagu soo celinayo xukun maxkamadeed ama dacwad madani ah oo ay qaadeyso maxkamadda awoodda u leh ee Dalkaas ka jirta; dacwadaha noocaas ah oo dhanna waa dacwado madani ah;

a) Ganaax lacageed oo aan markii hore ganaax ahaan loogu talagelin;
b) La wareegay ku dhacday ama lagu soo rogay si sharcigan waafaqsan; iyo Wasaaradda oo wixii ay qabato ula wareegeysa sida sharcigani qabo;
c) Dhammaan kirooyinka, biilasha, kharashyada iyo khidmadaha; iyo
d) Dhammaan wadarta lacageed ee bixintooda sharcigani farayo.

Qodobka 131
Masuuliyadda Ka Dhalanaysa Khassaaro Ama Waxyeello

Qofkii ku kaca fal dambiyeed ka dhan ah sharcigan, waxa ay, xukun maxkamadeed ka dib ama go'aan maamulku ka gaaray ka dib, dowladda Soomaaliya ku yeelaneysaa:

a) Wax kasta oo khasaare ah ama dhaawac ah ee ka dhashay fal dambiyeedka;
b) Wax kasta oo kharash ah ee ku baxay raadintii, qabashadii, baaristii iyo dacwo oogistii fal dambiyeedkaas; iyo
c) Kharashkii ku baxay haynta ama qabashada hantidaas, kalluunkaas, nuquladaas ama wixii kale ee la xiriira fal dambiyeedkaas;
Inta uu la'eg yahay magdhawga laga bixinayo khasaarahaas, dhaawacaas ama kharashkaas waxaa xukun ka gaari karta maxkamadda, isla markaana maamulka ay khuseyso
ayaa isku daraya wadarta ganaaxa lacageed ee khasaaraha iyo fal dambiyeedka dhacay.

Qodobka 132
Masuuliyadda Lagu Qaadayo Shirkadaha Iyo Howlwadeenada Shirkadaha

1) Haddii uuna sharcigani si kale tilmaamin, qofkii shaqaale, sarkaal ama wakiil shirkadeed ah ee ku Xadgudba sharcigan, Shirkadda uu ka tirsan yahayna waxaa loo qaadanayaa in ay ayaduna ku xadgudubtay sharciga, haddii:
a) Shaqqalahaas, sarkaalkaas ama wakiilkaasi uu ka shaqeynayay howl ka mid ah waajibaadkiisa ama shaqo muuqata ama Wasaaradda; iyo
b) Wada lahaanshaha, shirkadaha ay;
i.Si cad ama si maldahan ugu idmatay falka ama ka baaqsashada fulinta sharciga ee sababay fal dambiyeedka;
ii.Si toos ah ama si dadbadan uga warqabtay falka ama ka baaqsiga fulinta sharciga ee sababay fal dambiyeedka.
2) Marka laga reebo sida ku qoran farqadda (3), Agaasimha shirkadda ama qof kasta oo madax ka ah shirkad noocii ay doonto ha ahaate, taas oo ka shaqeysa howlo sharcigan khuseeya wuxuu galay dambi haddii qof xubin ka ah, shaqaale ka ah ama wakiil ka ah shirkadda uu madaxda ka yahay uu ku xadgudbo sharcigan.
3) Agaasimaha shirkadda ama ciddii kale ee madax ka ah shirkadda waxaa dambiga qodobkani dhigayo ka difaaci kara:
a) In uu qaaday dhammaan tallaabooyinkii loo baahnaa si loo hubiyo in sharcigan loo hoggaansamay;
b) In dambiga la galay asaga oo aan ka warqabin, oggolaan, lagala heshiin ama aan lala kaashan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 133

Masuuliyadaha lagu qaadayo Howlwadeenada

1) Dacwad kasta oo sharcigan la xiriirta, falkii ama ka gaabinta fulinta ee uu geysto qof ka mid shaqaalaha markabka ama qof kale oo la shaqeynaya marka waxaa loo qaadanayaa inuu geystay Howlwadeenka markabku, haddii aan si cad looga beri yeelin.

2) Arrimaha ku xusan faqradda (1), dambiga ka baajin maayo qof ka mid ah shaqaalaha Markab ama qof kale toona dambi uu isagu iskii u galay oo uu ku xadgudbay sharcigan.

Qodobka 134

Masuuliyadaha Maamulaha Kasoo Gaaraya Falalka Wakiilkiisa

1) Haddii arrin uu sharcigani faray ama uu ka reebay qof "maamulaha" uu fullin waayo ama uu ka reebtoomi waayo qof wakiil u ah maamulaha, waxaa loo qaadanayaa in fal dambiyeedkaas uu geystay isla maamulaha naftiisu, ilaa uu maamuluhu ka caddeeyo in qofkaas sheeganaya wakiilnimada maamuluhu uuna heysan idan uu ku metelo maamuha markii uu dambigaas gelayay.

2) Arrinta ku qoran farqadda (1) ka reebi meyso maamulaha dambi uu isagu iskii u galay oo kasoo horjeeda sharcigan.

Qodobka 135

Racfaanada Laga Qaadanayo Go'aanada Lagu Gaaray Sharcigan

Wasiirka oo la tashanaya Wasaaradda Caddaalada ayaa dhisaya Guddi Racfaan oo ka kooban ugu yaraan seddax qof oo aqoon iyo waaya -aragnimo u leh maamulka kalluumeysiga, sharciga iyo howlaha kalluumeysiga si ay u dhegeystaan racfaanka laga qaadanayo xukunada u dhacay si sharcigan waafaqsan, una qoraan oo usoo saaraan habraacyo la faafiyay oo ku saabsan awoodda xulasho, shaqo iyo go'aan qaadasho ee uu leeyahay Guddigan Racfaanku.

CUTUBKA 10-AAD

SOO KOOBIDDA DACWADAHA MAAMUL EE ISA SAARAN

Qodobka 136

Dacwadaha Maamulka Oo Kooban

1) Wasaaradda, oo la tashanaya Wasaaradda Cadaaladda, ayaa dejinaya nidaam oggolaanayo in dacwado maamul la qabto oo go'aanno laga gaaro dambiyada lagu xadgudbay sharcigan, inta aan ka aheyn kuwa ku saabsan:

a) Fal dambiyeedyada ka hor imaanaya shuruucda Soomaaliya, xataa haddii ayna falalkaasi dambi ku aheyn sharcigan dhexdiisa;

b) Dambiyada la xiriira fal dambiyeedyo calami ah oo abaabulan ama uu galay dabiile ka tirsan koox abaabulan oo dambiilayaal ah oo dalalka isaga gudba;

c) Dambiyo la xiriira naf go'day, xayiraad, handadaad ama rabshado ama goodin loo geystay qof kasta oo uu ku jiro sarkaalka kalluumeysi ee idman ama kormeere kale.

2) Marka la diyaarinayo nidaam dacwo qaadista maamul ee xeerkan sida ku qoran faqradda (1) ee qodobkan, waa in maanka lagu hayaa arrimahan soo socda:

a) Heerka aqoonta iyo habka magacaabista qofka iyo awoodda sharci ee qof kasta oo loo idmanayo in uu go'aan ka gaaro dacwadaha maamulka;

b) Habraaca dhegeysiga dacwadaha maamulka;

c) Waxaa looga baahan yahay in la ogeysiiyo shaqsi lagu eedeyey dacwo maamul si uu u ogolaado ama uu u diido dacwadaha maamul.

d) haddii qofka lagu soo eedeeyay inuu sharcigan ku xadgudbay uu oggolaado in dacwadda aan maxkamad la geyn uu maamulku u qaado si sharcigana waafaqsan, maamulka ayaa dacwadiisa qaadaya; waa haddii Wasaaradda Caddaaladdu aysan go'aamin in ay danta guud ay ku jirto in dacwadan uu qaado dacwad-ooge maxkamadeed, dadkuna ay dhegeystaan;

e) haddii la oggolaado in qofka lagu soo eedeeyay dacwad maamul lagu qaado, wixii alaab ah ee si sharcigan waafqasan loola soo qabtay waxay marayaan isla dacwaddaas madaniga ah.

f) qofka la soo eedeeyey waxaa ka reebban inuu qabto howlo la mid ah kuwii lagu soo eedeeyey ilaa uu ka bixiyo wixii maamulku ku ganaaxay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

3) Heshiis isku dhaf ah ayaa la qorayaa si loo qaabeeyo qodobbada iyo shuruudaha ay Wasaaraddu ogolaato ayadoo metalaysa Soomaaliya si loogu qaado qofka uu ku dhacay ganaaxa maamul, caddaddaas oo inta ay la ekaaneyso:

a) Oo go'aaminayso si waafaqsan sharcigan, warbixinna uu ka diyaarinayso Wasaaradda oo la tashanaysa Wasaaradda Caddaaladda, warbixintaas oo ku saabsan faahfaahinta dambigii dhacay iyo heerka ciqaabta ama ganaaxa la saarayo qofka galay;

b) Haddii uusan sharcigan si kale u tilmaamin, ciqaabtaasi kama badan karto heerka ugu hooseeya, ka mana sare mari karto ciqaabta ugu sarreysa ee lagu qaado dambiga midkan la midka ah; intaas waxaa dheer kalluunkii uu sharci darrada ku jilaabtay oo lagu qiiimeeyay sicirka macquulka ah ee uu suuqa uu ka joogo;

c) Waxaa ka mid noqonaya lacagtii uu ka faa'iiday ama uu qofka u keydsaday ayadoo ka timid dambigii uu horey u galay, caddaddaas oo ku salaysan qiimeyn uu soo sameeyay qof khabiir ah, taas oo ah mid ay aqbali karto maxkamad sharci ah;

d) Waxaa xisaabta lagu darsanayaa haddii markabka dambiga galay uu yahay mid aan ruqsad haysan ama yahy markab shisheeye; in uu kordho heerka ganaaxu;

e) Haddii dambigu mar labaad dhaco, ama uu fal dambiyeedku soo noqnoqdo, mar walba ganaaxu wuu ka sii badanayaa ganaaxii la saaray dambigii hore;

f) Waxaa kaloo ku jira kharashkii dawladda uga baxay howshaan darteed.

4) Dedejinta dacwad maamuleed oo la gaaray si waafaqsan farqadda (1), waxa ay noqonaysaa waxba ka jiraan haddii aan ganaaxii la xukumay oo dhammeystiran lagu bixin muddo 14 cisho gudahood ah oo ka billaabaneysa maalintii go'aanka xukunka la ogeysiisyey qofka xukuman; waxaana dacwada loo gudbinayaa Xeer Ilaaliyaha Guud si uu dacwad ugu soo oogo.

5) Haddii qofka la xukumay uuna aheyn Soomaali, lacag bixintuna ay ka soo billaabatay dalka kale, safaaradda dalkaas meteleysa ayaa xaqiijineysa bixinta ganaaxaas lagu soo rogay si waafaqsan farqadda (1).

6) Haddii ganaaxa la wada bixiyo ama safaaraddu caddeyso bixintiisa sida ku xusan farqadda (3), Wasaaraddu waxay amraysaa sii deynta alaabtii la qabtay ama in loo iibiyo sida qofkaas go'aansado.

7) Heshiiska isku dhafka ahi wuxuu qori karaa in wax kasta oo loo adeegsaday ama ka qeybgalay fal dambiyeedka lala wareegayo.

8) Lacagta lagu helo heshiiskan isku dhafka ah wuxuu la mid yahay ganaax maxkamadi go'aamisay.

9) Qofkii ku dhaqaaqa kalluumeysi, ama howlo la xiriira ama howlo kale oo ku keeni kara dacwa qaadis maamul ayadoo hore looga mabnuucay howlaha noocaas ah wuxuu gelayaa dambi, wuxuuna muteysanayaa ganaax aan ka badneyn midka ugu sarreeya ee uu qorayo jadwalka koowaad, oo ay u dheer tahay wixi kharash ah ee dawladda ka galay howshaas darteed.

CUTUBKA 11-AAD

CADDEYN

Qodobka 137

Caddeymaha Aaladda La Socoshada Markabka

1) Dhammaan macluumaadka iyo xogaha laga helo ama lagu ogaaday adeegsiga aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka ee markabka sida sharcigani qabo, oo ay ka mid yihiin kaamerooyin markabka dushiisa ku xiran oo loogu talagalay la socoshada, xogtaas waxaa loo qaadanayaa, haddii aan si ka duwan la soo caddeyn, in:

a) Ay ka timid markabka la tilmaamay;

b) Si sax loo soo tebiyay ama loo soo diray;

c) Uu xogtan bixiyay hawlwadeenka markabku, ha ahaado kabtanka, milkiilaha ama kireystaha markabka

e,

Waxaana la kala caddeynayaa in xogta ama warbixinta sidaan lagu helay ama lagu ogaaday ay ku timid qoraal ahaan ama muuqaal ahaan loo soo diray;

2) U qaadashada uu dhigayo qodobkan faqraddiisa (1) way dhaqangeleysaa haddii xogtan la keydiyay soo tebinta/dirista ka hor ama ka dib.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

3) Aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka ama aalad kale ee wax lagula socdo oo loo rakibay si waafaqsan sharcigan waxaa qaanuun ahaan loo qaadanayaa in ay bixiyaan xog sax ah.

4) Sarkaalka kalluumeysi ee idman ama qofkii kale ee Wasaaraddu si qoraal ah ugu idmaday howshan, wuxuu dhiibi karaa caddeyn ama shahaaddo qoreysa;
a) Magaciisa, cinwaankiisa iyo darajadiisa;
b) Inuu awood u leeyahay inuu akhriyo qoraallada ama muqaaladda ay mashiinnada awoodda u heli ka qabtaan ama ka helaan aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka;
c) Taariikhda ama saacadda xogta laga qabtay ama laga helay aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka iyo faahfaahinta xogta;
d) Magaca iyo summad af-garashada wicitaanka markabka ay saaran tahay aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka, kaas oo uu asagu yaqaan ama laga xaqiijiya buug diiwaan ah, wax duubaan ama dukumiintiyo kale oo rasmi ah; iyo
e) Caddeyn ah in ay muuqato in aysan jirin wax cillad ah oo haysata aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelkas, habka war-tebinteeda, ama makiinadaha kale ee xogta lagu qabto ama lagu helo;

Qodobka 138
Caddeynta Laga Helay Dayax-gacmeed

Caddeyntii laga helo dayaxgacmeed awood u leh inuu bixiyo farriimo sax ah iyo xogo kale oo ku saabsan markabka waxaa loo qaadanayaa mid la aqbali karo oo sax ah, haddii markabku si ku talagal ah farriintaas ugu diray dayaxgacmeedka iyo haddii kaleba.

Qodobka 139
UQAADASHO

1) Dhammaan kalluunka la helo asagoo dul saaran Markab lagu gelay dambi sida sharcigan uu qabo, waxaa loo qaadanayaa in la qabtay ayadoo fal dambiyeedkii faraha lagula jiro.
2) Markii la qaadayo dacwad la xiriirta sharcigan:
a) Waxaa muhiim ah in la caddeeyo meesha la sheegay in falku ka dhacay, Meesha ku qoran buugga diiwaanka ama qoraallada kale oo rasmiga ah ee ay diiwaan geliyeen markab ama diyaaradd sharci fulin ayna sheegaan in ay tahay goobtii falku ka dhacay; ayaa loo aqoonsanayaa in ay tahay meesha uu falku ka dhacay;
b) Keenidda nuqul qoraal ah ama caddeyn muujinaya soo gelitaan oo sarkaal kalluumeysi oo idmani uu caddeeyay inuu yahay nuqulkii saxda ahaa ayaa caddeynta koowaad u ah waxyaabaha ku qoran buugga diiwaanka ama qoraallada kale oo rasmiga oo ay helaan markab ama diyaadrad sharciga fulinaysa.
3) Marka la qaadayo dacwad sharciyeed ku saabsan ku xadgudub sharcigan;
a) Sarkaalka kalluumeysi ee idman ama kormeere ayaa keenaya caddeyn ku fadhida sababo maangal ah oo lagu rumeysto in kalluunka ay dacwadu la xiriirto laga jillaabtey meel cayiman oo ka mid ah biyaha Soomaaliya ama ay maamusho Urur Goboleedka Maareynta kalluumeysiga ee Soomaaliya ay xubin ka tahay; oo
b) Maxkamadduna, ka dib markey tixgeliso caddeyntaas, ay garowsato in ay caddeyntu tahay mid maangal ah,
Kalluunka oo dhanna waxaa laga soo qaadayaa in loo jillaabatay sida loo sheegay, haddii aanan la keenin caddeyn middaas ka duwan.
4) Markii la qaadayo dacwad sharciyeed ku saabsan ku xadgudub sharcigan:
a) Sarkaal kalluumeysi ee idmani wuxuu keenayaa caddeyn ku fadhida sabab maangal ah oo lagu rumeysto in kalluunka ay dacwaddu la xiriirto la jillaabtay ayadoo la isticmaalayo shabaqyada sabbeeya; oo
b) Maxkamadduna, markii ay tixgelisay caddeyntaas, ay garowsatay in ay caddeyntu sax tahay, dhammaan kalluunka waxaa loo qaadanayaa in loo jillaabtay qaabka dacwada lagu sheegay; haddii aan la keenin caddeyn middaas ka duwan.

5) Haddii la soo gudbiyo xog ku saabsan howlo kalluumeysi ama hawlo la xiriira oo markab sameeyay, waxaa loo qaadanayaa in uu xogtaas bixiyay hawlwadeenka markabku, ha ahaado kabtanka, milkiilaha ama kireystaha markabka, ilaa laga caddeeyo in uuna dhiibin ama uuna amrin qof ayaga ka mid ahi

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

6) Qoraal kasta ama summad walba oo la geliyo buugga, khariiradda ama dukumiintiga kale ee markabka, kaas oo sharcigani dhigayo in la heysto ama loo adeegsado diiwaangelinta howlaha markabka, waxaa loo qaadanayaa inuu qoray hawlwadeenka markabku, ha ahaado kabtanka, milkiilaha ama kireystaha markabka.
7) Aalad kasta oo sheegta goobta walaxi ku sugan tahay ee lagu xiray markab ama diyaarad si sharcigan loogu fuliyo waxaa loo qaadanayaa mid sax ah.

Qodobka 140
Mas'uuliyad Adag

Marka ay Xeer-ilaalintu soo oogayso dambi ku xusan Sharcigaan, waxaa waajib ah in dacwad ooguhu cadeeyo in eedeysunuhu ku talagal u galay dambi ama inuu sameeyay fal dambigaas ka dhalanaya

Qodobka 141
Culeyska Cadeymaha

1. Marka la qaadayo dacwad sharcigan la xiriirta, qof ku eedeysan inuu galay dambi ku saabsan howl ruqsad u baahan, qofka ayaa laga rabaa inuu caddeeyo inuu ruqsad u heystay shaqada uu qabanayay.
2. Marka qof lagu soo eedeeyo inuu jebiyay Qodobka 68aad ee sharcigan, qofka ayaa laga rabaa inuu caddeeyo in xogta la bixiyay ay aheyd mid run ah, dhammeystiran oo sax ah

Qodobka 142
Carqaladeynta Caddeynta

1) Cidna ma carqaladeyn karto caddeyn la xiriirta fal dambiyeed xadgudub ku ah sharcigan.
2) Ayadoo aanu xaddidneyn baahsanaanta faqrsadda (1), qofna:
a) asagoo saaran Markab la ceyrsanayo, la kori doono, markaas la korayo ama loo sheegay in uu soo korayo sarkaal kalluumeysi oo idman, kama tuuri karo markabka dushiisa, mana burburin karo kalluun, waxsoosaar kalluun, qalab, dukumiinti, walxo qarxa, waxyaabo sun ah ama wax kale, ayadoo ujeeddadu tahay in laga badbaadiyo qabasho ama la qariyo faldambiyeed lagu jebiyay sharcigan;
b) lama sii deyn karo markab la xayirey, kalluun, waxsoosaar kalluun ama wax kale oo loo haysto si sharcigan waafaqsan ama uu ku dhaqaaqo ama ka baaqsado inuu ka hortago fal lagu sii dayn karo markab, kalluun, waxsoosaar kalluun, qalab ama wax kale oo loo hayay si sharcigan waafaqsan, haddii uu ogaa in markabka, kalluunka, waxsoosaarka kalluunka, qalabka ama walax kaleba loo hayay si sharci ah iyo haddii kalaba;
c) Ma burburin karo, waxyeello uma geysan karo; ma howl-gabsiin karo ama si kale uma carqaladeyn karo dhisme kasta ama qalab kasta oo uu ruqsad loo siiyay si sharcigan waafaqsan; ama
d) Haddii sharcigani farayo in markabka lagu xiro aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka, ha joogo biyaha Soomaaliya ama meel ka baxsan, ma burburin karo, waxyeello uma geysan karo, ma howl-gabsiin karo ama si kale uma carqaladeyn karo aaladdaas dhaqdhaqaaq tebinta ee markabka saaran, ma gelin karo ama kuma shubi karo aalad dhaqdhaqaaq tebinta ama aaladda la socoshada markabk xog iyo warbixin macnadarro ah ama aan rasmi ahaan loogu baahneyn.
3) Qof kasta oo jebiya faqradaha (1) ama (2) wuxuu galay dambi, wuxuuna muteysanayaa ganaax aan ka badneyn midka ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba.

CUTUBKA 12-AAD
DAMBIYO, GANAAXYO IYO CIQAABYO

Qodobka 143
Dambiyo, Ganaaxyo Iyo Ciqaabyo

1) Haddii uuna sharcigani si kale u tilmaamin, ganaaxa ugu badan ee la saari karo qofkii sharcigan jebiya waxaa lagu xusay qeybta A ee Jadwalka Koowaad; ganaaxa ugu hooseeyana waxaa lagu cayimay qeybta B ee Jadwalka Koowaad.
2) Jadwalka Koowaad waxaa wax looga beddeli karaa Xeer.
3) Haddii fal-dambiyeedka lagu sheegay sharcigan ama Jadwalka Koowaad uu ku saabsan yahay faqrad ama xaraf, kaas oo sii leh qeybo, jebinta lagu sameeyo mid kasta oo ka mid ah faqraddaas ama xar afkaas waxaa loo qaadanayaa inuu yahay fal-dambiyeed gaar ah.
4) Marka la cayimayo ama la go'aaminayo xaddiga ganaaxa waxaa la raacayaa tilmaamaha ku xusan qodobka 146.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

5) Dhammaan ganaaxyada lacageed waxaa lagu qaadayaa shilin Soomaali, ayadoo la raacayo heerka rasmiga ah ee sarifka uu jaan gooyo Bankiga dhexe ee Soomaaliya marka la soo saaray Sharcigan.
FG; Sarifka maanta inta uu marayo waa $1= 27.000 Sh.so

Qodobka 144
Tilmaamaha Lagu Caddeynayo Ganaaxyada ama Go'aannada

1) Ganaax ama go'aan maxkamadeed ama maamul uu go'aamiyo si waafaqsan sharcigan waa inuu lahaadaa saameyn ciqaabeed adag oo keeni karta in loo hoggaansamo sharcigan ama looga waantoobo fal-dambiyeedyada meel kastoo ay ka dhacaan, loogana xayuubiyo dambiilayaasha faa'iidadii ay ka heleen falalkooda sharci darrada ah.

2) Gaar ahaan, markii xukun la gaarayo ama go'aan maamul la qaadanayo waxaa lagu saleynayaa arrimo badan oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

a) Inta ay gaarsiisan tahay waxyeellada fal-dambiyeedku, ayadoo la tixgelinayo:

i. Heerka ugu sarreeya ee ganaaxa;
ii. habraacyada caalamiga ah iyo kuwa dalka iyo habdhaqanka wanaagsan markii loo eego culeys fal-dambiyeedka, oo ay ku jiraan fasiraadaha ay ku leeyihiin shuruucda caalamiga ah ee kalluumeysiga;
iii. Heerka saameynta uu fal-dambiyeedku ku leeyahay kheyraadka kalluumeysiga, deegaanka, dhaqaalaha iyo horumarka bulsho ee muwaadiniinta Soomaaliyeed;
iv. Baaxadda fal-dambiyeedka;
v. Inta ay la' egtahay muddada uu fal-dambiyeedku soo socday;
vi. Haddii ay jirto dhimasho ama dhaawac dad;
vii. Fal-dambiyeedyada is leh, haddii fal-dambiyeedyo badan oo isku mid ah la galay;

b) Xaaladda dambiilaha, ayadoo la eegayo:

i. Alaabta iyo faa'iidooyinka uu ka helay fal-dambiyeedyadii uu gelay;
ii. Haddii ay tahay markii ugu horreysay ee fal-dambiyeedkan la sameeyay;
iii. Haddii fal-dambiyeedyo badan oo kala duwani ay dhaceen;
iv. Haddii dambiiluhu uu kaligii fal-dambiyeedka sameeyay ama haddii uu dad kale la kaashaday;
v. Suurtagalnimada inuu dambiiluhu fal-dambiyeedkii mar kale ku laabto;
vi. Saameynta uu heerka ganaaxu ku yeelanayo dambiilaha;

c) Ganaax culus ama go'aan maamul oo adag ayaa lagu soo rogayaa fal-dambiyeedyada la xiriira weerar, is-hortaagid ama laaluushid kormeere idman, baare idman ama sarkaal kale oo kalluumeysi oo idman ama qof kasta oo gudanaya amarrada iyo masuuliyadaha uu sharcigani saarayo, waxyeello loo geystay agab kalluumeysi ama maraakiib, dhaawac qofeed, dhimasho, kalluumeysi sharci darro ah, been abuur, ku guul-darreysi u hoggaasimadda Qodobka 54 ee Sharciga, ama haddii waxyeello loo geysto degaanka, waxaa markabkiiba ugu yaraan muddo seddex bilood ah laga joojinayaa ruqsadda, fasaxa ama oggolaashaha kale, ama waaba la gala noqonayaa dhammaan.

d) Hadddi ay muuqato in xadgudubka sharcigan uu ku saabsan yahay dhaqdhaqaaqyo dambi oo dalalka isaga tallowsan ama dambiga la galay ayadoo la kaashanayo kooxo dambiilayaal ah oo dalalka isaga tallaaba, waxaa lagu soo rogayaa ganaax culus ama go'aan maamul oo adag oo aan ka yareyn boqolkiiba sagaashan ka mid ah ganaaxa ugu badan ee uu Jadwalka Koowaadi qorayo oo la saaro dambiyada la midka ah;

Qodobka 145
Dambiyo Guud

Qof kasta oo ku xadgudba qodob ka mid ah Sharcigan oo aanu qorneyn ganaax ama ciqaab lagu muteysanayo jebintiisa, qofkaasi wuxuu galay dambi uu haddii lagu xukumo ku muteysanayo ganaaxa ugu badan ee uu qorayo Jadwalka Koowaad ama laba laab faa'iidadii dhaqaale ee ka soo gashay xadgudubkaas, hadba tii labadooda badan, ama xabsi aysan muddadiisu ka badneyn seddax (3) sano; waxyeelladii soo gaartay kalluunka iyo Dhaqaalaha Buluugga ah waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka yareyn isu geynta kharashka ku baxaya dib uga soo kabashada waxyeelladii uu u geystay khayraadka badda ama degaanka, ama labadooda oo la isugu daray.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE HOUSE

Qodobka 146
La Wareegid

1) Haddii maxkamadi ay qof ku xukunto inuu Sharcigan ku xadgudbay, waxay amri kartaa la wareegidda walaxda ama walxahan soo socda:

a) Kalluun, wax kasta oo kalluun ka yimaada, markab (oo ay ku jiraan agabkiisa kalluumeysi, alaab, keyd, shixnad iyo diyaarad) agab kalluumeysi, qalab, walxo qarxa iyo waxyaabo sun ah oo dhammaantood loo adeegsaday fal-dambiyeedka;

b) Haddii fal-dambiyeedka lagu fuliyay markab, wixii kalluun ah ee markabka saarnaa xilligii fal-dambiyeedku dhacayay;

c) Haddii la iibiyay kalluun laga baqay in uu xumaado, lacagtii laga helay iibka kalluunkaas;

d) Shaygii kale ee loo qaatay, loo isticmaalay ama si kale uga qeybqaatay dhicidda fal-dambiyeedka ama si kale oo sharcigani sheegi doono.

2) Haddii kalluun ama wax kasta oo kalluun ka yimaada oo Sharcigani reebay ka kalluumeysigiisa la qabto, loona hayo si sharcigan waafaqsan, waa lala wareegayaa, wuxuuna ka mid noqonaya hantida Qaranka.

Qodobka 147
Bixin iyo Qaadasho Laaluushka

1) Qofna si toos ah ama si dadban iskuguma dayi karo in uu laaluusho sarkaalka fulinaya awoodaha iyo mas'uuliyaddaha uu u xilsaaray Sharcigani; ujeeddadii laaluushka laga lahaa hala gaaro ama yaan la gaarin.

2) Ma jiro qof fulinaya awoodaha iyo masuuliyadaha sharcigan farayo ama la xiriira sharcigan oo aqbali kara, qaadan kara ama naftiisa u raadsan kara laaluush ama qof kale u raadin kara, haddii ujeeddadii laaluushku fushay iyo haddii kalaba;

3) Qof kasta oo ku fashilma u hoggaansamidda faqradaha (1) ama (2), wuxuu galay dambi uu haddii la xukumo ku muteysanayo ganaax lacageed oo aan ka badneyn gaanaaxa ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad; ama xabsi aan ka badneyn shan sano; ama labadaba; intaas waxaa dheer in lala wareegayo wixii faa'iido ah ee qofkaas kusoo galay laaluushkii uu qaatay darteed, isla markaasna qofkii ku xadgudbay faqradda (2) ee qodobkan shaqada waa laga saarayaas; mar dambana looma oggolaanayo inuu ka shaqeeyo xafiis dadweyne oo dambe, waajibaad dambe ama howl dambe oo Sharcigan la xiriirta.

Qodobka 148
Ka Xayuubinta Faa'idooyinka Lacageed

Haddii maxkamad ay qof ku hesho inuu ku xadgudbay Sharcigan, maxkamadduna ay ku qanacdo in qofkaas uu sameynta fal-daambiyeedka ka helay ama ay u ururtay faa'iido lacageed, maxkamaddu, ayada oo aan tixgelinaysa ganaaxa ugu sarreeya ee sharcigani uu ku soo rogi lahaa dambigaas oo kale, waxay qofka ku amri kartaa inuu bixiyo ganaax dheeraad ah oo u dhigma xaddigii lacageed ee ay maxkamaddu ogaatay inuu qofkani ka helay fal-dambiyeed, xaddigaas oo ku saleysan qiyaas ay Wasaaraddu sameysay.

Qodobka 149
Maxkamaddu Waxay Soo Rogi Kartaa Magdhawyo Iyo Ganaaxyo Dheeraad Ah

Ayadoo ka dheeri ah ganaaxyadii iyo muddo xabsiyeedkii uu sharcigani dhigayay, haddii aanan sidaas si ka duwan la caddeyn, maxkamaddu waxay amri kartaa:

a) In la xiro muddo aan ka badnayn 12 bilood, iyo marka aan ganaaxa maxkamadda lagu bixin si waafaqsan shuruudihi looga baahna waxay amrikarta xarig u dhigma ganaaxa lacageed ee la bixin waayay.

b) La wareegidda markabka, kalluunka saaran iyo/ama agabka kalluumeysi ee saaran;

c) Laalidda ama hakinta wixii ruqsad ah ee la xiriira fasax, oggalaansho ama diiwaangelin;

d) Magdhaw la siinayo milkiilihii ay hantidiisu si toos ah ugu waxyeelowday, uguna burburtay fal-dambiyeedkii dhacay;

e) Magdhaw lagu gudayo kharashka ku baxaya nadiifinta wasakhoobiddii ka dhalatay fal-dambiyeedka ama ku baxaya fogeynta qalab si joogta ah u sababaya wasakhoowidda degaan badeedka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 150
Qodobka 151
Xaddiga Ugu Sarreeya Ee Lagu Kordhin Karo Ganaaxa Shirkadaha

Haddii shirkad weyn lagu helo in ay ku xadgudubtay Sharcigan; waxaa lagu seddax laabayaa inta uga badan ee lagu ganaaxi jiray dambigan oo kale.

Qodobka 152
Dambiyo Soo Laalaabta Iyo Dambiilayaal Soo Noqnoqda

1) Dambiyada maalin walba iska socda, maalin walba dambigaas waxaa loo qaadanayaa dambi cusub.

2) Ganaax iyo ciqaab walba oo lagu xukumo ama la go'aanmiyo in la saaro qof galay isla hal dambi wax ka badan hal jeer, mar walba ganaaxiisu/ciqaabtiisu way ka badnaaneysaa middii hore, mararka qaarkooda waxaa suuragal ah in ay noqoto tii hore laba laabkeed; waxaa kaloo intaas dheer in laga xayirayo ama lagala laabanayo ruqsadda ama ogalaashiyaha uu ku howgalayo, sidoo kale qofka waxaa laga joojinayaa inuu qabto shaqo sharcigan la xiriirta ilaa muddo la cayimay.

Qodobka 153
Amar Xayiraad

1) Wax kasta oo ganaax ama ciqaab ah oo uu sharcigani sheegay, maxkamaddu ama lagu maamulayo xaalad xeer maamul, Wasaaradda oo la tashanaysa xafiiska Garyaqaanka Guud ayaa waxay amri kartaa in qof caadi ah laga mamnuuco inuu ku howlanaado kalluumeysi ama dhaqdhaqaaq laxiriira biyaha Soomaaliya muddo ku eg shan sano, haddii qofkaas lagu helo inuu galay ama uu qirtay inuu galay:

a) Dambi ku saabsan kalluumeysi aan ruqsad loo heysan;

b) Ama dambiyo dhowr ah oo sharcigaan kasoo horjeeda.

2) Qof kasta oo laga mamnuucay inuu ku howlanaado howlo kalluumeysi ama dhaqdhaqaaq la xiriira, si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, ama mulkiilihii, howlwadeenkii ama kabtankii si ula kac ah ugu oggolaada qof looga mamnuucay shaqada si wafaqsan faqradda (1) inuu markab fuulo ama uu ku saarnaado amarkiisa iyo maamulkiisa, wuxuu galay dambi uu xukun ka dib ku muteysan doono ganaax la mid ah midka ugu sarreeya ee uu qorayo Jadwalba Koowaad; ama xabsi aan ka badneyn seddax san; ama labadaba.

Qodobka 154
Xariga Dadka Aan Dalka U Dhalan

Haddi dambi kasoo horjeeda sharcigan lagu galo meel ka mid ah Aagga Dhaqaale ee Gaarka ah, dambigaasna uu galay muwaadin dal kale ama la shaqeeya markab aan ka diiwaangashaneyn Soomaaliya, ciqaabta lagu xukumayo qofkaas kuma jiri karto xabsi, haddii uuna jirin heshiis sidaa ka duwan oo dhex maray Soomaliya iyo dalka muwaadinintooda arrintu khuseyso, kumana jiri karto wax ciqaab jireed ahi.

CUTUBKA 13-AAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 155
Xiriirka Kala Dhexeeye Shuruucda Kale Ee Soomaaliya

Haddii ay dhacdo in ay iska hor yimaadaan ama ay meelo isku khilaafaan sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka, marka laga reebo Dastuurka, sharcigan ayaa la raacayaa.

Qodobka 156
Wargalinada

1) Wixii wargalin ah ee uu sharcigan dalbanayo in la diro waa in ay ahaadaan qoraal.

2) wargalin ama dukumiinti walba oo lagu diray boosto sharci ah ama loo diray qaab elektaroonig ah waxaa loo qaadannayaa in la diray, wax laga qabtay ama la helay seddax maalmood oo ah maalmo shaqo ka dib taariikhdii warqadda la helay ama la diray, waase markii qofka warqadda boostada ama hab elektaroonig ah loogu diray uu caddeeyo in usan gaarin wargalintu ayadoo aysan ahayn khaladkiisa awgeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 157
Xeer-hoosaadyo

1) Wasiirku wuxuu sameyn karaa xeerar lagu socodsiinayo ama lagu hirgelinayo sharcigan, oo ay ka mid tahay, haddi aan wax xadidaya jirin:

a) Maareynta, qaabeynta ama maamulidda ka kalluumeysiga ama howlaha la xiriira ka kalluumeysiga dhammaan noocyada kalluunka iyo degaamada kalluunku ku nool yahay iyo wixii kale ee howl ah oo sharcigan soo hoos gelaya.

b) Hirgelinta ama meelmarinta qodob kasta oo ka mid ah heshiis caalami ah, heshiis maamul iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah.

c) Hirgelinta nidaam iskaashi iyo wada-shaqeyneed oo u dhexeeya hay'adaha dowladda, maamul gobaleedyada iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso.

d) U Sameynta aas-aas, xeerar iyo habraacyo habka loo dedejinayo dacwadaha maamul ee heshiisayada is dulsaaran ;

e) Dajinta shuruudaha, nidaamyada iyo arrimaha kale ee la xiriira heshiisyada oggolaanshaha, ruqsadaha, fasaxyada kale iyo diiwaangelinta sida sharcigani uu qabo;

f) Dajinta khidmadaha, kharashka adeegga, xaddiga lacagaha la soo rogayo, khidmada kirada ama lacag kasta oo loo bixiyo si waafaqsan sharcigan ;

g) Kala xadeynta aagagga, goobaha maamulka iyo xilliyada kalluumeysiga;

h) Caddeynta iyo ilaalinta noocyada kalluun ee halista ku sugan;

i) Diyaarinta foomamka, jadwallada iyo dukumiinti kasta oo sharcigani u baahan yahay;

j) Hirgelinta habraacyo iyo shuruudo loogu talagalay la socoshada, xakameynta iyo howlaha dabagalka ee la xiriira sharcigan;

k) Waajibaadka, aqoonta iyo magacaabista saraakiisha kalluumeysi ee idman, baarayaasha iyo shaqaalaha kale ee loo idmay in ay qabtaan howlaha la socoshada, xakameynta, dabagalka iyo hirgelinta waajibaadka sharcigani dhigayo;

l) Nidaaminta ama Mamnuucidda howlaha saameynta taban ku yeelan kara kheyraadka kalluumeysiga iyo degaan badeedka ay ka dhacaan;

m) Nidaaminta, xakameynta iyo maareynta howlaha cilmibaarisyada, sahamada, waxbarashada iyo tababarrada la xiriira kalluunka, kheyraadka kalluumeysiga iyo xaaladaha degaan badeedka la xiriira maareynta kalluumeysiga;

n) Dejinta shuruudaha isticmaalka iyo summadeynta markabka, agabka kalluumeysiga, qalabka oo ay ku jiraan aaladda la socoshada markabka iyo qalabka gabbaadka kalluunka iyo waxyaabaha kale ee ay tahay in xeer lagu soo saaro si sharcigan waafaqsan;

o) Nidaaminta kala soocidda kalluunka aan loo qasdin, haynta, habbeynta iyo maareynta kalluunka ama wax soosaarka kalluunka;

p) Habeynta, suuq geynta, fayadhowrka, iyo nadaafadda guud ee kalluunka;

q) Soodejinta iyo dhoofinta kalluunka iyo waxsoosaarka kalluunka;

r) Dejinta wixii ku saabsan xisaabta socota, diiwaan, dukumiinti ama xog qof ama koox looga baahan yahay in ay hayaan ama u dhiibaan si sharcigan waafaqsan, oo ay ka mid yihiin:

i. Foomka xisaabta socota, diiwaanka, dukumiintiga ama xogta ay tahay in la keydiyo, la dhiibo ama la wadaago;

ii. Muddada xisaabta socota, diiwaanka, dukumintiga ama xogta la heynayo, la dhiibayo ama la wadaagayo;

iii. Qofka xisaabta socota, diiwaankaas, dukumiintigaas ama xogtaas keydinaya, dhiibaya ama wadaajinaya; iyo

iv. Goobta xisaabta socota, diiwaankaas, dukumiintigaas ama xogtaas la dhigayo, laga dhiibayo ama lagu wadaagayo;

s) Qaadista tallaabooyinka laga ma maarmaanka ah ee lagu la dagaalamayo kalluumeysiga sharci darrada ah iyo howlaha la xiriira

t) Hirgelinta iyo ka qeyb qaadashada, la shaqeynta samafalka dhaqaale iskaashiga ee loo qoondeeyay heshiisyada caalamiga ah ee ka hortaga iyo ilaalinta noole biyoodka;

u) Wax ka beddelka Jadwalba Koowaad, qoridda ganaaxyada ka dhalanaya dacwadaha maamul ee bixinta magdhawyada ama wixii kale ee lacag bixin ah oo sharcigan lagu go'aamiyo;

v) Nidaam u yeelidda arrimaha kale ee loo baahan yahay ee sharcigan khuseeya ama sidooda kale u waafaqsan ujeeddooyinka iyo mabaadii'da sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

2) Wasiirku wuxuu, asagoo kala tashanaya hadba Wasaaradaha Xukuumadda Soomaaliya oo ay khuseyso, xeer u sameynayaa arrimahan soo socda:

a) dhisadda iyo keenista maraakiib kalluumeysiga iyo halbeeg u yeelidda sameynta maraakiibta noocaas ah;

b) Qeexidda shuruudaha ka horreeya bixinta diiwaangelinta maraakiibta kalluumeysi ee ka howgelaya Soomaaliya;

c) Dajinta heerarka badbaadada iyo shuruudaha looga bahan yahay maraakiibta loo isticmaalayo kalluumeysiga;

d) Dajinta shuruudaha loo baahan yahay si looga shaqeeyo markab kalluumeysi, ayadoo la tixgelinayo heshiisyada heer caalamiga ah; iyo

e) Dajinta shuruudaha shaqaalaha iyo aqoonta laga rabo si ay uga shaqeeyaan markab kalluumeysi oo Soomaaliya ka diiwaangashan.

Qodobka 158

Burin Iyo badalid

1) Sharcigan ayaa meesha ka saaraya, islamarkaasna beddelay Sharcigii Kalluumeysiga Soomaaliya ee Lr.29 2014

2) Sharci kale oo kasta, wareegto ama xeer aan la jaan-qaadeynin Sharcigan waa uu burinayaa

Qodobka 159

Awoodda Fullinta Sharcigaan

Waxaa iska leh awoodda fulinta sharcigaan Ciidanka badda iyo difaaca Xeebaha Soomaaliyeed oo kaashanaya Ciidanka ilaalada Xeebaha

Qodobka 160

Dhaqangal

Sharcigan Kalluumeysigu waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Lifaaqa Koowaad

JADWALKA KOOWAAD

DAMBIYADA, GANAAXYADA IYO CIQAABAHA:

QEYBTA A

JADWALKA HEERARKA UGU SARREEYA EE GANAAXYADA.

1) Heerka ugu sarreeya ee ganaax oo ku dhacaya fal-dambiyeed kasta oo gaar ah, kaas oo ku xusan faqradda ama xarfaha la xiriira Jadwalka Heerarka ugu Sarreeya ee ganaaxyada hoos ku qoran; lacagta lagu ganaaxayna waxaa lagu cayimay qeybta B ee Jadwalkan Koowaad.

2) Haddii Huuri ama markab yar dambiga lagu galay lagu qaadi maayo heerarka ganaax ee ku xusan Jadwalka hoose, ganaaxa lagaceed ee la saarayaana kama badan karo hal melyan oo shillin Soomaali ah.

3) Shuruudaha lagu mudanayo ganaaxa ugu yarina waxay ku qoran yihiin qeybta C ee Jadwalkan.

Qodobada iyo Faqradaha	Cinwaanka Qodobka	Heerka ugu Sareeya Ee Ganaaxa
12 (5)	Dano isdiidan	3

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

13 (6)	Hannaanka ilaalinta iyo maareynta	5
15 (4)	Hirgelinta Hanaanka Maareynta iyo ilaalinta Caalamiga ah	3
18 (5)	Cilmibaaris ku saabsan ilaalinta iyo maaraynta wax ku oolka ah	3
19 (4)	Soo saarista digniino ku saabsan noocyada kalluun ee u baahan ilaalinta ama khatar ugu jira inay dabar go'aan	4
20 (3)	Cayimidda goobo ama aaggagga	4
21 (6) marka laga reebo xarafka iyo farqada (1) (a)	Bedqabka deegaan badeedka	6
21 (6) marka laga reebo xarafka iyo farqada (1) (a)	Bedqabka deegaan badeedka warshadaha iyo wasaqda nukliyeerka	7
23 (2)	Mamnuucista Burburinta shacaabiga (Qara-dhagaxeed), bocoolaha badda si loo ilaaliyo deegaan xeebeedka kheyraadka kalluumaysiga	5
23 (3)	Mamnuucista Burburinta shacaabiga (Qara-dhagaxeed), bocoolaha badda si loo ilaaliyo deegaan xeebeedka kheyraadka kalluumaysiga	5
24 (5)	Maareynta Kalluumaysiga Aan Loo Qasdin	3
26 (3)	calaamadeynta agabka	3
27 (7)	aaladda gabbaadka kalluunka	4
28 (2)	Mamnuucidda ka kalluumaysiga aagga booyadda xog-uruurinta	3
29 (8)	Macnuucidda jillabashada iyo ka ganacsiga nibiriga iyo ilaalinta carjowleyda iwm	4
30 (6)	Mabnuucidda la xiriirta qubo badeedda	3
31 (5)	Mabnuucidda goynta dhegaha libaax badeedka iyo ka ganacsiga dhegihii lagu soo jaray sifo sharcidarro ah	5
32 (3)	Mamnuucidda hababka kalluumaysiga loo adeegsado qaraxyo iwm, iyo ganacsiga kalluunka lagu soo jilaabto hababkaas	3
33 (2)	Mamnuucidda Hababka kalluumeysiga jiriifka ah	3
34 (4)	Hababka kalluumeysi ee la mamnuucay- cabirka ugu yar agabka kalluumaysiga	3
35 (5)	Hababka kalluumeysi ee la mamnuucay- shabaagta waaf-qabadka sabaysa ee masaafada dheer	5
36 (3)	Mamnuucidda isticmaalka diyaaradaha iyo kuwa aan duuliyaha lahayn	3
37 (3)	Mamuucidda isticmaalka nalalka macmalka ah si loogu soo jiito kaluunka masaafooyin dhaadheer	3
38 (4)	Mamnuucidda faragalin ama burbrurin hanti qofkale oo dhextaal biyaha soomaaliya	3
39 (4)	isticmaalka, markab ku haysashada, soo dejin, soo gadasho, sii iibin qalab la mamnuucay	4

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

40 (2)	Mamnuucidda bad uga tagista ama ku tuuridda qalab, kalluun ama wax soo-saar kalluun	4
41 (2)	Mamnuucidda wax ka badelka cadeymaha kalluunka iyo wax soo saar kalluun ee la soo baaray	3
42 (2)	Mamnuucid haysasho, ka ganacsi, dhoofin kalluun ama wax soo saar kalluun ee lagu helay ama lagu qabtay si ka hor imaanaysa sharcigaan ama hanaanka maaraynta iyo ilaalinta caalamiga ah.	4
43 (3)	Mamnuucid ka ganacsi kalluun iyo wax soo saar kalluun oo ka hor imaanaya sharci dowlad kale	5
44 (6)	Mamnuucid maraakiibta ku jirta liiska maraakiibta kallluumaysiga sharcidarrada ah (IUU) oo ay gacanta ku hayso Hay'ad Goboleedka Maaraynta Kalluumaysiga Gobalka	5
45 (3)	Mamnuucid maraakiib aan dalna ka diiwaangashanayn	6
46 (2)	Sharci u hoggaansamidda dadka heysta ruqsad, oggolaansho ama fasax kale	5
47 (5)	Shuruudaha warbixinada	4
49 (2)	Bandhig, wareejin, dhoofin, soo dejin iyo sii deynta kalluun nool	4
52 (3) iyo (4)	Shuruudaha looga baahan yahay muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo maraakiibtooda ee ku sugan meelaha ka baxsan xeer-xeyndaabka qaranka	6
53 (4)	Shuruudaha xaaladaha shaqada ee shaqaalaha saran maraakiibta qaarkood	6
54 (2)	Maabnuucnimada shaqsiyaad ka tirsan ama xiriir la leh koox dambiilayaal caalami ah oo ku howlan jebinta xeyndaabka sharcigaan	6
55 (2)	Badeecad ku kala wareejin maraakiib dekadaha Soomaaliya, biyaha Soomaaliya iyo meelaha ka baxsan biyaha Soomaaliya ka taliso	4
56 (4)	Shuruudaha laga doonayo dhammaan maraakiibta shisheeye ee kalluumaysiga si ay usoo galaan una joogaan biyaha Soomaaliya	4
63 (10), (11), (12)	Wakiillada	5
67 (4)	Macluumaad loo baahankaro lana baarikaro	4
68 (5)	Macluumadku run ah, dhamaystiran oo sax ah, ayna reeban tahay in la baabi'iyo	5
70 (11)	Macluumaad qarsoodi ah	2
71 (3)	Qarinta macluumaadka la xiriira xarunta la socodka kalluumaysiga	2

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

74 (4)	Ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale iyo diiwaangelinta loo baahan yahay	5
75 (9)	Xaaladaha iyo shuruudaha laga rabo ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale iyo diiwaangelinta	4
76 (2)	Shuruudaha rar isku wareejinta	4
77 (2)	Shuruudaha cilmibaarista	3
78 (3)	Shuruudaha Aaladda gabbaadka Kalluunka	4
79 (2)	Shuruudaha diiwaangelinta Nidaamka la socodka maraakiibta	2
81 (5)	Codsasho ruqsad, oggolaanho, diiwaangelin iyo fasax kale	2
83 (7)	Baaritaanno lagu hubinayo markabka ka hor diiwaan galinta iyo ruqsad siinta	3
89 (9)	Hakin, ka noqosho ruqsad, baabi'in ogolaansho diiwaan galin iyo fasax-yada	5
101 (2)	Awoodda bixinta amarka dekad ku soo xirashada markabka	5
104 (4)	Qeybo ka saaridda qalabka markabka la qabtay	4
105 (3)	Raacdayn ama ku dabajir	5
108 (2)	Waajibaadka ka saran howlgeliyaha iyo xubnaha shqaalaha gacan-siinta kormeeraha	5
109 (2)	Wargalin kormeeraha lagu qoray Markabka	1
113 (3)	Ishortaaga iyo u hogaansamid la'aanta sarkaalka idman	5
116 (3)	Aaladda la socoshada - shuruudaha farsamo ee laga rabo	2
117 (4)	Habka lasocoshada - farsamada laga rabo	3
118 (2)	Habka aqoonsiga tooska ah	3
124 (4)	Musuubo dabiici ah iyo dhib culus	4
126 (7)	Baaris ku samaynta maraakiibta dekadda taagan	4
128 (2)	Mabnuucidda adeegsiga ama gacansiinta adeegsiga dekadda diidmada kaddib	5
129 (4)	Shuruudaha laga rabo marakiibta Soomaaliyeed	5
130 (40)	Qaadashada kalluumaysiga sharcidarrada ah ee ka hor imaanaya hanaanka maaraynta iyo ilaalinta caalamiga ah	5
138 (9)	Dacwadaha maamulka oo kooban	5
144 (3)	Carqaladeynta caddeynta	5
147 (1)	Dambi guud	4
149 (30	bixin iyo qaadasho laaluush	5
154 (2)	Amar xayiraad	5

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

QEYBTA B
QIIMAHA LACAGEED EE HEERARKA GANAAXYADA

Heerka	Ganaaxa ugu badan oo shilin soomaali ah melyanno
1	110
2	140
3	270
4	420
5	560
6	3,000
	280, 000

QEYBTA C
TILMAAMAHA LOO RAACAYO GANAAXYADA UGU YAR.

Tilmaamaha soo socda ee u dhigan ganaaxa ugu yar ayaa la tixgelinayaa markii la dejinayo ganaaxyada iyo go'aannada maamul ee laga qaadayo dambi dhacay markiisii koowaad:

1) Kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira ee ku saabsan ganacsiga Tuunnada iyo kalluumada ku nooca ah, 60% ganaaxa ugu badan;

2) Si ka duwan farqadda (1); fal dambiyeed fudud oo dhacay markii ugu horreysay, kaas oo aan saameyn muuqata ku laheyn kheyraad kalluumeysiga iyo degaanka, 5% ganaaxa ugu badan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

SHARCI LR.009

Taariikh: 20 Maarso 2023

OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA AQOONSIGA IYO DIIWAANGELINTA DADWEYNAHA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0240/B11/23**, ku taariikheysan **14/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-029-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE SHARCIYEEDKA AQOONSIGA IYO DIIWAANGELINTA DADWEYNAHA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
02 MAR 2023
SOO GELID/RECEIVED

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

Cutubka 1aad:
Qodobbo Aasaasi Ah
Qodobka 1aad:
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.

Qodobka 2aad:
Ujeeddooyinka Sharciga

Sharcigan wuxuu suurtagelinayaa ujeeddooyinka soo socda:

1) In la hirgeliyo hannaanka diiwaangelinta iyo aqooonsiga muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo si sharci ah u caddaynaya aqoonsiga muwaadinka una fududeynaya helidda dhammaan adeegyada uu u baahan yahay iyo xuquuqda sharcigu u oggolyahay;
2) In la taabo-geliyo hawlaha aqoonsiga iyo diiwaangelinta dadweynaha iyadoo la abuurayo hay'ad qaran oo fulisa howlaha iyo waajibaadka uu sharcigu u igmaday.
3) In lagu bixiyo Tirsi Aqoonsi gaar ah kaas oo lagu aqoonsanayo qofka haysta tirsigaas;
4) In la abuuro nidaam aqoonsi oo leh astaamo amni lagu xaqiijin karo aqoonsiga qofka si loo fududeeyo in dhammaan adeeg-bixiyaashu (hey'daha dowliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay) ay si kalsooni leh ula macaamilaan qofka sita aqoonsigaas iyaga oo ku kalsoon in qofkaasi uu yahay cidda uu sheeganayo;
5) In Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay yeelato nidaam aqoonsi oo la mid ah nidaamyada caalamiga ah.
6) In nidaamka aqoonsiga Dalka ku dhismo si sifo sharci oo ka jawaabaysa baahida aqoonsi ee dadweynaha ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kuwaas oo u baahan in ay helaan adeegyada aqoonsi ee u fududeyn lahaa macaamilkooda dhaqaale iyo xiriirradooda gudaha iyo dibeddaba.

Qodobka 3aad:
Eray-bixin

Haddii aan si kale loogu sheegin sharciga gudihiisa, ereyada hoos ku qoran mid waliba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:

1) **"Sugid"** Waxaa loola jeedaa hab lagu xaqiijinayo in qofku yahay ruuxa uu sheeganayo;
2) **"Hay'adda"** Waxaa loola jeedaa Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka - (National Identification and Registration Authority – NIRA) ee lagu asaasay Sharcigan;

3) **"Xog-dhalyada"** (biometric) Waxaa loola jeedaa tilmaamaha la xiriira waxyaabaha u goonnida ah qofka ee ka turjumaya qaybo ka mid ah jirkiisa sida faraha, midabka indhaha, muuqaalka wejiga, iyo qaar kale;
4) **"Warqadda Dhalasho"** Waxaa loola jeedaa caddaynta la siiyo qofka u dhashay Soomaaliya;
5) **"Golaha Wasiirrada"** Waxaa loola jeeda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo ah hey'adda ugu sarraysa Laanta Fulinta ee Dowladda si waafaqsan Qodobka 97aad ee Dastuurka Ku-meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
6) **"Xarunta Xog-kaydinta"** Waxaa loola jeedaa barta lagu uruurinayo xogta ay Hay'addu hayso;
7) **"Maareeye Guud"** Waxaa loola jeedaa Maareeyaha Guud ee Hay'adda;
8) **"Abtirsi"** Waxaa loola jeedaa xiriirka ka dhexeeya xubnaha qoys la diiwaan-geliyey sida waalidka iyo carruurtooda;
9) **"Habka Aqoonsashada Asaasiga"** Waxaa loola jeedaa hab qofka lagu aqoonsanayo oo loo abuuray inuu dadka u siiyo aqoonsasho loo adeegsado maamulka iyo macaamilka uu qofku la yeesho hey'daha dowliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay;
10) **"Aqoonsasho"** Waxaa loola jeedaa hannaanka lagu hubinayo, lagu aqoonsanayo lagaga go'aan-gaarayo qofka uu yahay;
11) **"Kaar-aqoonsi"** Waxaa loola jeedaa kaarka aqoonsiga Qaranka ee ay Hay'addu si midaysan uga bixiso dalka oo dhan;
12) **"Wasiirka"** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u- heshiisiinta;
13) **"Wasaaradda"** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
14) **"Xog-horaadda"** Waxaa loola jeedaa macluumaadka laga diiwan-gelinayo qof walba sida magaca qofka, magaca aabbaha, magaca hooyada iyo taariikhda dhalashada;
15) **"Diiwaangelin"** Waxaa loola jeedaa xogta qofka oo lagu diiwaangeliyo si sharciga waafaqsan;
16) **"Nidaam"** Waxaa loola jeedaa habka aqoonsashada asaasiga ah;
17) **"Tirsi Aqoonsi"** Waxaa loola jeeda lambar aan taxane aheyn oo hal mar la isticmaalayo una goonni ah hal qof kaas oo qofka leh tilmaan soocaysa inta uu nool yahay iyo marka uu dhinto kadib.

Qodobka 4aad:
Xaqa Helidda Aqoonsiga

1) Muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo qof walba oo si sharci ah u degan dalka marka laga reebo kuwa ku jooga booqashada gaaban

waxay xaq u leeyihiin in la diinwaangeliyo lana siiyo aqoonsi iyo dokumintiyada kale laguna kala duwayo habraaca iyo nooca aqoonsiga.

2) Wasiirka, isagoo tixgelinaya talo-bixinta Hay'adda, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye faahfaahinaya hannaanka fulinta diiwaangelinta Aqoonsiga Qaranka.

Qodobka 5aad:
Habraaca Sugidda Qofka

1) Qof walba oo qaadanaya kaarka aqoonsiga waa in la sugi karaa isaga oo la imaanaya dukumiinti ama wax u dhigma oo caddeynaya qofnimadiisa.
2) Shuruudaha diiwaangelintu waa inay fududaadaan una oggolaadaan dadweynaha in ay helaan adeegyada aqoonsi ee ay u baahan yihiin.

Qodobka 6aad:
Bixinta Kaarka Aqoonsiga

Bixinta Tirsiga, Daabacista Kaarka Aqoonsiga iyo adeegyada aqoonsi ee kale waxaa khidmadda lagu jaangoynayaa xeer-nidaamiye uu soo saarayo Wasiirku.

Qodobka 7aad:
Maareynta Cabashooyinka

1) Hay'addu waxay hirgalinaysaa nidaam lagu maareeyo cabashooyinka iyo tabashada ka timaada helidda iyo isticmaalka kaarka aqoonsiga kaasoo yeelan doona heerar kala duwan.
2) Hay'addu waxay soo saari doontaa Habraaca Xallinta Cabashooyinka oo loo hirgalin doono hab casriyaysan.
3) Cabashooyinka muwaadiniinta ee hay'addu u xalin weydo sidii la rabey ama lagu xallin waayey muddada ku xusan Xeer-hoosaadka, waxa ay u gudbeysaa Wasiirka.
4) Go'aanka kama dambaysta ah ee Wasiirka ee ku saabsan cabashada laga soo qaatay Hay'adda waxaa looga dacwoon karaa Maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 8aad:
Xogta La Diiwaangelinayo

1) Lama uruurin karo xog xasaasi ah oo keeni karta in qofka la takooro ama la faquuqo.
2) Xogta la diiwaangeliyay looma isticmaali karo ujeedooyin ka baxsan ujeeddada loo qabtay marka laga reebo inta sharcigu oggol yahay.
3) Xogta la diiwaangelinayo waa in ay ku koobnaato waxyaabaha soo socda:
    a) Magaca qofka oo la xeriiro magaca aabaha iyo kan awoowaha, ama magaca qoyska oo afaran.
    b) Lama diidi karo Magacyada , sida Xaaji, Suldaan, Shiikh, Ugaas, Shariif, Garaad, Macallim iwm.

c) Magaca hooyada (oo saddexan);
d) Taariikhda uu qofku dhashay (maalinta,bisha iyo sannadka);
e) Goobta uu ku dhashay (Degmada, Gobolka, Waddanka);
f) Deegaanka uu deggan yahay;
g) Jinsiga (dhedig ama lab);
h) Sawirka qofka (teesare);
i) Raadka faraha (10ka farood) iyo/ama sumadda indhaha (IRIS);
j) Lambarka telefoonka iyo/ama "emailka" qofka;
k) Xaaladda sharci (Muwaadin, Qaxooti,iwm.)
l) Xogta sugidda aqoonsiga qofka ee ku soo baxay dukumiinti.

4) Xogta la ururiyay waxa lagu keydinayaa xarun ta xog-dhiggista Hay'adda.

Cutubka 2aad:
Dhismaha Hay'adda
Qodobka 9aad:
Asaasid

1) Waxaa Sharcigan lagu asaasay "Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka".
2) Hay'addu waxay leedahay shakhsiyad qaanuuni ah oo ay ku maareyso arrimaheeda.
3) Xarunta Dhexe ee Hay'addu waa Caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho waxayna laamo ku yeelanaysaa magaalooyinka waaweyn ee dalka iyo hadba meeshii kale ee ay u baahato.
4) Wasiirku, isagoo tixgelinaya tala-bixinta hay'adda, wuxuu go'aan maamul ku soo saarayaa astaanta ay yeelanayso Hay'adda.

Qodobka 10aad:
Ujeeddooyinka Hay'adda

Ujeeddooyinka loo asaasay Hay'adda waxaa ka mid ah:

1) In muwaaddiniinta ay noqdaan dad la aqoonsan karo oo dukumiintiga aqoonsiga ay sitaan iyo tirsiga aqoonsi ee u goonida ah uu noqdo mid sahlaya adeegyada ay u baahan yihiin;
2) Inay xoojiso isku-dubbaridka iyo wax-wada-qabadka shaqooyinka hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada ay aqoonsashada qofku muhiimka u tahay iyo isku xirka adeegyada dowladda qaab elektaroonik ah.
3) In ay abuurto, kuna heyso xogta aqoonsiga xarunta xog-dhigista ee hay'adda taasoo keydinaysa dhammaan xogaha dadweynaha ee muhiimka u ah dawladda;

4) Inay gacan ka geysato koboca dhaqaalaha Qaranka, horumarinta fursado dhaqaale, ka-hortagga is-dulbuurad dhanka adeeg-bixinta iyo ku-xadgudub xuquuqaha aadamiga oo ka dhalan kara aqoonsasho la'aan.

Cutubka 3aad:
Hawlaha , Awoodaha, Iyo Qaab-Dhismeedka Hay'adda
Qodobka 11aad:
Hawlaha Hay'adda

Hay'addu waxay qabanaysaa hawlahan soo socda:

1) Inay abuurto, ka shaqaysiiso, maamusho oo ay dhawrto nidaam maarayn aqoonsi oo asaasi ah, si ay u suurta-gasho in qof kasta oo muwaaddin ah ama si sharci ah ugu nool Soomaaliya la diwaangeliyo;
2) In mawaaddiniinta ku diwaangeliso nidaamka ayna siiso tirsi aqoonsi oo u gooni ah oo lagu aqoonsan karo;
3) Inay bixiso kaar aqoonsi ee heer Qaran;
4) In ay mas'uul ka tahay barnaamijyo lagu hormaarinayo adeegyada la xiriira diiwaangelinta iyo keydinta xogta aqoonsiga dadweynaha oo ay kala shaqaynayso wasaaradda sidii loo maarayn lahaa nidaamyada elektaroonigga ah ee diiwaangelinta iyo maamulka xogdhigista ay ku kaydinayso diiwaangelinta xogta aqoonsiga dadweynaha;
5) In ay hirgeliso tababarada nidaamka diiwaangelinta madaniga ah iyo qorshayaasha taakulaynta farsamo;
6) Inay shakhsiyaadka siiso xogta la xiriira xaaladdooda diiwaan-gelineed;
7) In ay hubiso dhawrsoonaanta xog-dhalyada iyo xog-horaadda shakhsiyaadka ee ay Hay'addu ururisay, una maarayso si xilkasnimo leh oo waafaqsan Sharciga;
8) In ay qaab elektaroonik ah isugu xirto xarunta xog-dhigista iyo hay'adaha Dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ee bixiya adeegyada uu aqoonsigu muhiimka u yahay, taas oo loo marayo habraacyo;
9) Inay cilmi-baaris ku samayso sida ugu waxtarka roon iyo waxyaabaha guud ee ku soo kordha sida loo maareeyo aqoonsiyada hay'adaha kale ee Dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn, isla markaasna ay la wadaagto xogta ama waayo'aragnimada la xiriira aqoonsashada;
10) Inay si wax-ku-ool ah isugu duwdo, tayo ahaanna u dhisto laamaha ay Hay'addu ka furato dalka;
11) Si loo hormariyo mudnaanshaha siyaasadda, dhaqaale, bulsho iyo amni ee dalka; iyo
12) Inay fuliso, hadba inta sharcigu u oggolanaayo, wixii hawl kale ah oo muhiim u ah ama ku habboon gudashada waajibaadkeeda.

Qodobka 12aad:
Wadashaqeynta iyo Iskaashiga

1) Hirgelinta sharcigan waxay Hay'addu iskaashi kala yeelanaysaa Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha kale ee Dawladda.
2) Dhammaan Hay'adaha gaarka loo leeyahay, waxaa waajib ku ah in ay Hey'adda kala shaqeeyaan fulinta howlaheeda si waafaqsan sharcigan.
3) Dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah in ay is diiwan-geliyaan, qaataanna tirsi gooni u ah.

Qodobka 13aad:
Awoodaha Hay'adda

1) Hay'addu, iyadoo aan dhaafayn xeyndaabka Sharcigu xadeeyey, waxay awood u leedahay wax kasta oo daruuri u ah ama ku habboon sidii ay u gudan lahayd hawlaheeda.
2) Iyadoon la xadayneyn sida guud ee faqradda hore u dhigan tahay iyo awoodaha ka ratibmaya in Hay'addu leedahay shakhsiyad qaanuuni ah, Hay'addu waxay si gaar ah awood ugu leedahay:
    a. In ay dacwad soo oogi karto, laguna soo oogi karo;
    b. In ay geli karto heshiisyada la xiriira shaqadeeda;
    c. Inay iibsan karto, haysan karto ama iska iibin karto hantideeda si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka;
    d. Inay qaadato wixii qalab ama dhaqaale ah ee loogu deeqo si waafaqsan shuruucda dalka u taalla;
    e. In iyadoo raacaysa Sharciga Shaqaalaha Rayidka lagu maamulo ay qorato, shaqadana ka eryi karto shaqaalaheeda; iyo
    f. In ay kala shaqayn karto ama u idman karto dhinac kale hawlaha la xiriira hirgelinta nidaamka aqoonsiga si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

Qodobka 14aad:
Awoodaha Wasaaradda

Si waafaqsan Sharcigaan, Wasaaraddu waxay yeelanaysaa awoodaha soo socda:

1) Dejinta siyaasadaha guud ee aqoonsiga dadweynaha;
2) Ka-baaraandegista iyo curinta shuruucda ay hay'addu u baahan tahay;
3) Kor-joogteynta hawlaha hay'adda iyada oo ku ilaalinaysa qodobbada sharcigan;
iv. metelaadda hay'adda ee golaha wasiirrada iyo goleyaasha baarlamaankaba.

Qodobka 15aad:
Guddiga Maamulka Hay'adda (Board of Directors)

1) Hay'adda waxay yeelanaysaa Guddi Maamul oo 9 xubnood ah kana kooban Maareeyaha, iyo 8 xubnood oo ka kala imaanaya wasaaradaha iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud,waana sida soo socto:
    a. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, (xubin)
    b. Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, (Xubin)
    c. Wasaaradda Amniga Gudaha, (Xubin)
    d. Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda, (Xubin)
    e. Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, (xubin)
    f. Wasaaradda Maaliyadda, (Xubin)
    g. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada,(Xubin)
    h. Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowallada,(Xubin)
2) Xubinta wasaarad kasta waxa soo magacaabaya wasiirka ay khusayso, isaga oo kusoo xulaya aqoon iyo khibrad shaqo oo la xiriirta hawlaha hey'adda.
3) Xubnaha guddiga maamulka waxay yeelanayaan gunno uu go'aamiyo Wasiirka.
4) Maareeyaha guud ee hay'adda waa guddoomiyaha guddiga maamulka (boardof directors). Marka uu maareeyuhu maqan yahay waxaa shir guddoonka qabanaya Maareeye Ku-xigeenka.
5) Haddii xubin guddiga kabanaanato waxaa lagu soo buuxinayaa si waafaqsan faqraqdda 2aad ee Qodobkan.

Qodobka 16aad:
Waajibaadka Guddiga Maamulka

Guddiga maamulku wuxuu u xilsaaran yahay :

1) Hubinta iyo ansixinta qorshe hawleedka Ha'yadda kadib marka uu soo gudbiyo Maareeyaha Guud ee hay'adda.
2) Dhageysiga warbixinta sanadlaha ah ee hay'adda.
3) Ansixinta xeer hoosaadka iyo habraacyada hay'adda.
4) Ka-baaraandegista iyo ansixinta miisaaniyadda Hay'adda iyo ansixinta xisaab xirkeeda.

Qodobka 17aad:
Kulamada Guddiga Maamulka

1) Kulmada caadiga ah ee guddiga waxay qabsoomayaan afartii biloodba halmar.
2) Guddigu waa in uu kulmaa markasta uu isugu yeero:
3) Wasiirka;
4) Guddoomiyaha guddiga 3.Guntanka kulamada guddiga iyo go'aanna doodu waxay ku ansaxayaan tiro hal dheeriya (50%+1). Guddoomiyaha wuxuu codeeynayaa kaliya marka ay codadku isle ekaadaan.

5) Hay'addu waxay diyaarinaysaa xeer-hoosaad lagu maaraynayo kulamada guddiga, una gudbinaysaa Wasiirka si uu u oggolaado.

Qodobka 18aad:
Qaab-dhismeedka Maamulka

1) Hay'addu waxay yeelanaysaa:
   a. Maareeye Guud;
   b. MaareeyeKu-xigeenGuud;
   c. Agaasime waaxeedyo; iyo d. Shaqaale.
2) Qaab-dhismeedka Hay'adda waxa soo saaraya Maareeyaha Guud, waxaana meelmarinaya Wasiirka.

Qodobka 19aad:
Magacaabista Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa

1) Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana meel marinaya Golaha Wasiirrada, kadibna waxaa Xeer Madaxweyne ku soo magacaabaya Madaxweynaha JFS sida ku xusan Qodobka 90aad, Xarafkiisa (K) iyo Qodobbada 99aad ee Dastuurka, isla markaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS.
2) Xil-ka-qaadista Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa waxaa loo marayaa habraaca ku cad faqradda 1aad ee Qodobkaan.

Qodobka 20aad:
Shuruudaha looga baahan yahay Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenka Maareeyaha Guud

Qofka loo magacaabayo Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa waa in laga helaa shuruudahan soo socda:

1) Inuu yahay muwaaddin Soomaaliyeed Muslim ah.
2) In dhimirkiisu fayow yahay;
3) Inda'diisu aanay ka yarayn 30sano;
4) Inuu haysto shahaado heer-jaamacadeed;
5) Inuu leeyahay waayo aragnimo shaqo oo aan ka yarayn (5) sano, khibradna u leeyahay maamulka iyo maaraynta;
6) Inaan si kama danbeys ah maxkamadi ugu xakumin·danbi 5tii sano ee ugu danbeeyse.;

Qodobka 21aad:
Xil-Waayidda iyo shaqo ka joojinta Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa

1) Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa Xilka waxay kuweyn karaan:
   a. Xanuun xagga dhimirka ah uu soo caddeyo dhakhtar lagu kalsoon yahay;

b. Geeri;
c. Xil-gudasho la'aan si waafaqsan habraacyada waajibaadka shaqo ee hay'adda.
d. Dembi-ciqaabeed ay soo caddeysay maxkamadda awoodda u leh; iyo
e. Iscasilaad laga aqbalay.

2) Wasiirku wuxuu shaqo-ka joojin ku samayn karaa Maareeyaha ama ku-xigeenkiisa sababaha soo socda dartood:
3) U hoggaansamid la'aan faritaanada kor-joogteeneed ee Wasiirka si waaafaqsan sharcigan; iyo
4) Ku xadgudubidda sharcigaan, xeer-nidaamiyeyaalkiisa iyo shuruucda kale ee dalka.

Qodobka 22aad:
Awoodaha Maareeyaha Guud

Awoodaha Maareeyaha Guud waa sida soo socota:

1) Dejinta,lasocodka,hirgelinta iyo kormeerka qorshaha shaqo ee Hay'adda;
2) Diyaarinta qaab-dhismeedka iyo habraacyada lagu socodsiinayo hawlahaHay'adda;
3) Diyaarinta miisaaniyad-sanadeedka Hay'adda;
4) Qoristaiyoxil-ka-qaadistashaqaalaha Hay'adda si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka; iyo
5) Matalaadda Hay'adda dhinaca Sharciga iyo gelista heshiisyada.

Qodobka 23aad:
Xilka Ku-xigeenka Maareeyaha Guud

Ku-xigeenka Maareeyaha guud wuxuu u xil saran yahay:

1) Qabashada xilka Maareeyaha Guud marka uu shaqada ka maqan yahay;iyo
2) Qabashada wixii hawl kale ee Maareeyaha Guud si gaar ah ugu igmado.

Qodobka 24aad:
Agaasinnada iyo howlwadeennada Hay'adda

1) Hay'addu waxay yeelanaysaa Agaasin waaxeedyo hoggaamiya waaxaha Hay'adda.
2) Hay'addu waxay shaqaalaysiinaysaa howlwadeenno iyo shaqaale ku kaalmeeya fulinta howlaheeda iyo xilkeeda.
3) Qorista, shaqo-gelinta, anshax-marinta iyo shaqo ka saaridda agaasimeyaalka, howlwadeennada iyo shaqaalaha kaleba waxaa loo waafajinayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka.
4) Hay'addu waxay kaloo yeelaneysaa laamo iyo faracyo ka hirgeliya hawlaheeda dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 25aad:
Dhaarta Xafiiska

1) Xog-dhigista waa inay taallaa xarumaha Hay'adda ee dalka gudihiisa ah, waxaana ka reeban in lagu hayo ama la geeyo meel ka baxsan xarumaha rasmiga ah ee Hay'adda, dadka gacanta ku hayaana waa in ay yihiin dad Soomaali ah oo la dhaariyey, lagana saxiixay qoraal.
2) Shaqaalaha Hay'adda ee u xilsaaran maamulka xogta inta aysan billaabin shaqada loo igmadey waa in Maareeyaha Guud hortiisa iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ay ku maraan dhaarta ilaalinta xogta dhawrista u baahan ee Hey'adda, waana in laga saxiixaa heshiis xog-ilaalineed, loona caddeeyaa cawaaqibta ka dhalan karta bixinta xogta dadweynaha.
3) Dhaarta lagu xusay faqrada hore ee qodobkan ma beddeleyso dhaar kale oo Sharcigu ku waajibiyo shaqaalaha.
4) Waajibaadkii ay dhaartu saartay qofka shaqaalaha ka ah Hay'adda, kama dulqaadeyso xitaa haddii uu shaqada uga tago hawlgab awgeed ama sabab kasta oo kale.
5) Habraaca dhaarta iyo xog-ilaalinta la xiriira waxaa si faahfaahsan loogu soo saari doonaa Xeer-nidaamiye Hay'adda.

Qodobka 26aad:
Miisaaniyadda Hay'adda

Hay'addu waxay yeelanaysaa misaaniyad u gaar ah oo ka imanaysa:

1) Miisaaniyadda guud ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;
2) Dakhliga laga helo adeegyada ay Hay'addu fuliso waxaa loo marayaa si waafaqsan habraaca Sharciga maamulka maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya;
3) Kaalmada miisaaniyadeed ee laga helo deeq-bixiyeyaasha gudaha iyo dibadda si waafaqsan habraac maaliyadeedka Dawladda.
4) Maareeyaha Guud ee Hey'adda waa in uu sanad walba ugu dambeyn 30ka Oktoobar uu diyaariyaa qorshaha Miisaaniyad-sanadeedka Hey'adda, taasoo muujineysa dhammaan kharashka iyo dakhliga ee la filayo, una gudbiyo guddiga maamulka, ka dibna Wasaaradda Maaliyadda ee XFS.

Cutubka 4aad:
Qoobbo Qubane Ah
Qodobka 27aad:
Xeer-nidaamiyeyaal, habraacyo, iyo xeer-hoosaadyo

1) Wasiirku waxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiyeyaal faahfaahinaya qodobbada sharcigan.

2) Hay'addu waxay awood u leedahay soo saarista xeer-hoosaadyo iyo habraacyo ay ku fulineyso howlaheeda oo aan ka hor imaanayn Sharcigaan iyo xeer nidaamiyeyaalkiisa.

Qodobka 28aad:
Faldambiyeedyada La Xiriira Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha

1) Qof kasta oo ku kaca arrimaha soo socda wuxuu galayaa dembi uu ku muteysanayo ciqaabta ku qoran faqradda 2aad ee Qodobkan:
   a. Bixinta hor-xog aan run ahayn ama sheegasho qof uusan ahayn xilliga diinwaangelinta.
   b. Ka hor istaagga qof xaq u leh in uu qaato tirsiga iyo kaarka aqoonsiga
   c. Isku day sameyn kaarka aqoonsiga si aan sharciga ahayn.
   d. Sameynta nuqul been abuur ah ee kaarka aqoonsiga
   e. Isticmaalka iyo haysiga kaarka aqoonsi qof kale leeyahay.
   f. Ka been sheegid diinwaangelin hore loo sameeyay
   g. Isku day isdiinwaagelin mar labaad ama in ka badan.
   h. Baahinta ama la wadaagista xogta diinwaangelinta qof kale oo aan shaqo ku lahayn.
   i. Ku kicista khiyaano kasta oo la xeriirta aqoonsiga iyo diinwaangelinta
   j. Dhammaan faldambiyeedyada la xeriira been-abuurka dokumenti ee xeerka ciqaabta soomaaliyeed.
2) Qof walba oo faldambiyeedyadan ama kuwa la mid ah gala waxaa lagu qaadayaa xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Qodobka 29aad:
Danaha Iska Hor-Imaanayo

Qofna xil kama qaban karo, mana sii joogi karo hay'adda, ha ahaado xubin Guddi Maamul ama shaqaale, haddii ay jiraan dano iska hor-imaanaya si waafaqsan habraacyada shaqo ee hay'adda.

Qodobka 30aad:
Burin

Sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin qodobbada Sharcigan waa la buriyay.

Qodobka 31aad:
Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa markuu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uuna saxiixo Madaxweynaha JFS laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

SHARCI LR.010

Taariikh: 20 Maarso 2023

OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIADEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0238/B11/23**, ku taariikheysan **14/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Lagu Hagayo Nidaam Maaliyeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-031-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA

HINDISE SHARCIYEEDKA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIYADEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA



CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad: Magaca iyo Baaxadda Sharcigan

1) Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa.
2) Sharcigani wuxuu nidaaminayaa arrimaha maaliyadeed iyo cashuureed ee la xiriira soo saarista iyo ka faa'iidaysiga khayraadka Batroolka iyo Macdanta si waafaqsan Sharciga Batroolka Lr.19 ee Febraayo 8, 2020ka iyo Sharciga Macdanta Lr. 7 ee Janaayo 9, 1984ka.
3) Sharcigani wuxuu faahfaahinayaa arrimo cashuureed u gaar ah cidda ka shaqaynaya qodista khayraadka dhulka hoostiisa.

Qodobka 2aad: Erey-bixin

Erayada soo socda, haddii aan Sharcigan gudihiisa si kale loogu fasirin, waxaa loola jeedaa eray kasta fasiraadda ku hor qoran:

1) "Xaddiga kaasoo galey" Waxaa loola jeedaa caddadka iyo xaddiga ama faa'iido, dayn dhaaf, adeegyo ay isu qabanayaan, isticmaal hanti maguuraan kasta oo qof qof kale u gudbiyo, ha ahaato lacag ay isu wareejiyeen ama hanti, ka jarista waajibtaadka cashuur, tayada adeegyada, isticmaalka lacagta, isticmaalka hantida ama wixii kale ee adeeg ah. Iyadoo lagu qiimeeyey laguna jaan gooyey qiimaha suuqa.
2) "Sanduuqa dayactirka deegaanka" Waxaa loolaa jeedaa sanduuqa loo abuuray in uu daboolo ama lagu bixiyo kharashaadka ku baxaya marka laga guurayo goobta wax laga qodayey, dayactirka goobta la deganaa iyo hawlaha ku baxaya rarista. Lacagta loo qoondeeyey sanduuqa waa lacag ka madax bannaan hawlaha qodista khayraadka. Wasaaradda Batroolka ayaa mas'uul ka ah hawlahaas.
3) "Cidda ay isku xiranyihiin" waxaa loola jeedaa Labo qof ama shirkado oo uu ka dhaxeeyo xariir qaraabo, shuraako ganacsi, iyo xariir laga fahmi karo daneysi.
4) "Aagga qandaraaska" waxaa loola jeedaa goobta oggolaanshaha heshiis wax-soo-saar wadaag lagu bixiyey.
5) "Qiimaha" waxaa loola jeedaa hantida kharashaadka ku baxay dhismaha, kharashaadka warshadeynta, kharashaadka soo saarista hantida, kharashaadka dayactirka, kharashaadka wax-ka-beddelka, kharashaadka rakibitaan, kharashaadka iibinta iyo kharashaadka la xariira helida ama iibinta hantidaas.
6) "Saliidda Ceyriin" waxaa loola jeedaa macdan saliid ah oo aan la sifeyn iyo dhammaan haydar-karboonnada (Hydro Carbon) dareera ama laga miiray gaaska dabiiciga ah.
7) "Barta laga dirayo ama laga rarayo" waxaa loola jeedaa meesha lagu uruuriyo ama laga daabulayo batroolka.
8) "Aagga qodista iyo horumarinta" waxaa loola jeedaa aagga dhuleed/badeed ee loo qoondeeyey in laga qodo lagana hormariyo batroolka ama macdanta, sida uu dhigayo heshiiska wadaagga wax-soo-saarka.
9) "Kala wareejin" waxaa loola jeedaa hantida la iibiyey, la beddeshay ama qayb wareejisay.
10) "Aagga uu koobayo sharciga ogolaanshaha qodista khayraadka" waxaa loola jeedaa goobta qandaraaslaha loogu oggolaaday inuu ka baaro kheyraadka dabiiciga.
11) "Sahaminta" waxaa loola jeedaa baadigoob kheyraadka dabiiciga.
12) "Qodista wixii laga helay" waxaa loola jeedaa macdanta lagu helay baadigoobta ama sahminta.
13) "Halka laga soo saarayo" waxaa loola jeedaa goobta macdanta loo asteeyey in laga soo saaro ama laga qodo.

14) "Heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa" waxaa loola jeedaa heshiiska wax-soo-saarka wadaagga ee batroolka/macdanta oo ay dawladdu bixisay.
15) "Hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa" waxaa loola jeedaa hawlaha la xiriira batrool qodista iyo hawlaha macdan qodista.
16) "Shatiga qodista khayraadka dhulka hoostiisu" waa oggolaanshaha (shati) loo bixiyey batroolka iyo shatiga macdan qodista.
17) "Heshiiska iibinta" waxaa loola jeedaa shirkad heysata shatiga qodista khayraadka dhulka hoostiisa in shirkad kale ay ka iibin karto shatigaas iyado oo ay ku beddelan karto lacag cad iyo waxii la halmaala.
18) "Financial instrument" waxaa loola jeedaa kharashka la halmaala dulsaarka iyo waxyaabaha kale sida ku qeexan Sharciga Caalamiga ah ee xogta maaliyadda (International Financial Reporting Standards).
19) "Aagga shatiga/Liisanka " waxaa loola jeedaa goobta shatiga heshiis wax-soo-saar wadaag lagu bixiyey.
20) "Xuquuqda macdanta" waxaa loola jeedaa oggolaanshaha (shati) loo bixiyey macdanta iyo shatiga qodista macdan.
21) "Hawlaha macdanta" waxaa loola jeedaa qodista iyo sahminta macdanta la rajaynayo.
22) "Macdanta" waxaa loola jeedaa macdanta dabiiciga ah ee lala soo bixi karo sida dhagaxda qiimaha leh oo loo adeegsan karo warshadeynta, wax-soo-saarka beeraha iyo waxii lamid ah.
23) "Shatiga macdan qodista" waxaa loola jeedaa shatiga lagu bixiyey heshiiska wax-soo-saar wadaaga macdanta.
24) "Qodista macdanta" waxaa loola jeedaa soo saarista macdanta.
25) "Gaaska dabiiciga ah" waxaa loola jeedaa dhamaan hydrocanbon-nada gaaska ah iyo kuwa aan falgelin, oo ay ka mid yihiin gaaska qoyan, gaaska qalalan, gaaska ka koreeya saliidda iyo midka ka hara, kadib marka hydrocarbon-ka dareera laga saaro gaaska qoyan, oo aan ahayn saliidda ceyriin.
26) "Xuquuda Lahaanshaha ee mudnaanta leh" waxaa loola jeedaa lacag bixinta mudaysan (tusaale ahaan sanadkiiba mar) oo la xiriirta xuquuq lasocota lahaanshaha kheyraadka dhulka hoostiisa, laakiin qodobadaan 4 iyo 14 ma khuseeyaan.
27) "Batroolka" waxaa loola jeedaa hydrocarbon kasta oo iskiisa u sameysmay, halahaado qaab gaas, dareere ama adke.
28) "Hawlaha Batroolka" waxaa loola jeedaa hawl looga danleeyahay in lagu sahmiyo batroolka lagu baarro, hormariyo, soo saaro, iibiyo ama lagu dhoofiyo batrool iyo in lagu dhiso, lagu taago, lagu hawlgeliyo dhismooyin, kaabayaal iyo xarumo loo adeegsanayo horumarinta, wax-soo-saarka iyo dhoofinta batroolka ama dib u habeynta ama kala furfurista dhismo kasta oo kamid ah kaabayaashaas ama xarumahaas.
29) "Xuquuqda Batroolka" waxaa loola jeedaa qaybta uu xaqa u leeyahay qandaraaslaha ku jira heshiiska wadaagga wax-soo-saarka.
30) "Lacagta soo xerootey" waxaa loola jeedaa lacagaha laga helay hantida la iibiyey.
31) "Habka shaqada" waxaa loola jeedaa xeer nidaamiye lagu qeexi doono qaabka shaqo wadaagga ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Batroolka & Macdanta.
32) "Heshiiska wax-soo-saarka wadaag" waxaa loola jeedaa heshiis la galay ama la bixiyey, kasoo qandaraasluhu ku helayo saami kamid ah shidaalka lagu soo saaro hawlaha batroolka, saamigaas oo loogu beddelayo hawlihii uu qabtay.
33) "Rajayn" waxaa loola jeeda waxa la filaayo in la heli karo oo la xariira macdanta.

34) "Hay'adda korjoogteynta batroolka" waxaa loola jeedaa Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.
35) "Deganaansho" waxaa loola jeedaa shirkad laga abuuray gudaha Dalka Soomaaliya ama sanadka cashuureedka gudihiisa maamulka shirkadu ay dagan yihiin Soomaaliya.
36) "Hay'adda Maamulka Dakhliga" Waxaa loola jeeda Wasaaradda Maaliyadda ee masuulka ka ah arrimaha Dakhliga.
37) "Sharciga dakhliga" waxaa loola jeeda Sharciga Maamulka Dakhliga.
38) "Aagagga kala duwan ee hawlaha macdan qodista" waxaa loola jeeda shaqooyinka wax-soo-saarka macdaneyd ee ka socda goobaha kala duwan in aagga weliba loo xisaabinayo gaarkiisa.
39) "Aagagga kala duwan ee hawlaha batroolka" waxaa loola jeeda shaqooyinka wax-soo-saarka batroolka ee ka socda goobaha kala duwan in aagga weliba loo xisaabinayo gaarkiisa.
40) "Eexasho" waa isfaham u dhaxeeya dad wax kala iibsada si aan waafaqsaneyn qiimaha suuqa (Transfer pricing rules).
41) "Milkiyadda lahaanshaha" waxaa loola jeedaa lahaanshaha tooska ah iyo midka dadbanba.
42) " Qiimeynta sanadle ee Rasamaalka" waxaa loola jeedaa qiimaha lagu soo iibsaday oo laga jaray qoondaymaha hay'addaha cashuuraadku u qoondeeyeen in xaquuqda laga gooyo si loo dhawro cadaalad ahaanshaha cashuurta lagu waajibiyey.
43) "Qiimaynta sanadle" waxaa loola jeedaa Sannad Cashuureedka.
44) "Wiqiyad (Ounce)" waxaa loola jeedaa halbeegga lagu cabiro macdanta iyo waxii lamid ah oo u dhiganta 28 gram.

Qodobka 3aad: Cidda Sharcigani Ku Waajibay

1) Sharcigani waxaa lagu fulinayaa cid kasta oo fulinaysa hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa ee ruqsad haysta ama aan haysan.
2) Si looga hortago in la baalmaro Sharcigan, Wasaaradda Maaliyadda, iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta, waxay soo saari kartaa xeer-nidaamiyeyaal lagu ballaarinayo xadka Sharcigaan si loogu dabaqo qandaraas-hoosaadleyaalka ka shaqaynaya hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa. Marka la soo saarayo xeer-nidaamiyeyaalka ku xusan faqradda 2aad ee Qodobkan, Wasaaradu waxay tixgelinaysaa arrimaha soo socda:
    a) Haddii qandaraas hoosaadluhu uu yahay mid la shirkoobay/bahwadaag ganacsi la ah cidda fulinaysa hawlaha qodista khayraada dhulka hoostiisa;
    b) Haddii qandaraas hoosaadluhu yahay rukhsadle idman kaasi oo u xilsaaran fulinta howlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa.
    c) Haddii qandaraas hoosaadluhu samaynayo hawlgallo muhiim ama kaabayaal u ah shaqada qodista khayraadka dhulka hoostiisa;
    d) Heerka qandaraaas hoosaadluhu ku leeyahay howlaha soo saarista batroolka ama macaashka ka soo gelaya fulinta howlaha batroolka marka lala barbardhigo dhigiisa; iyo
    e) Haddii ujeeddada ugu weyn ee xiriirka ka dhaxeeya qandaraaslaha iyo qandaraas hoosaadleyaalka tahay in lagu yareeyo ama looga baaqsado bixinta cashuur ku waajibi lahayd si waafaqsan sharcigan.

Qodobka 4aad: Cashuuraha uu Nidaaminayo Sharcigani

1) Cutubka 2aad iyo Cutubka 3aad ee sharcigaani waxay jidaynayaan xuquuqda lahaanshaha khayraadka laga qodo dhulka hoostiisa iyo cashuurta macaashka shirkadaha ku hawlan

qodista khayraadka dhulka hoostiisa, iyadoo qaybta sharci ee 5aad ay nidaaminayso maamulka cashuurahaas.

2) Cutubka 4aad ee sharcigan wuxuu nidaaminayaa xaddiga cashuuraha ee ku cad heshiisyada qodista khayraadka dhulka hoostiisa, Cutubka 4aad waxay caddaynaysaa dhammaan cashuuraha oo ay ku jiraan furdooyinka, cashuuraha wax-soo-saarka, cashuurta macaashka shirkadaha, lahaanshaha xuquuqda khayraadka, cashuurta iibka iyo cashuuraha Maamul Goboleedyada, Gobalka Banaadir iyo Degmooyinka.

CUTUBKA 2AAD: BATROOLKA

Qodobka 5aad: Waajibinta Xuquuqda Lahaanshaha Khayraadka

1) Cid kasta oo haysta xuquuqaha batroolka waxaa ku waajibay in uu bixiyo xuquuqda lahaanshaha khayraadka ka hor celinta kharashka iyo wadaagga fa'iidada
2) Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxaa loo xisaabinayaa xaddiga lagu asteeyey sida ku cad Jadwalka 1aad Faqradaha 1aad iyo 2aad.
3) Batroolka la soo saaray waxaa lagu cabirayaa: -
   a) Barta cabirka sida ku cad heshiiska wadaagga wax-soo-saarka ee khuseeya; ama
   b) Barta ay go'aaminayso Wasaaradda Batroolka haddii aan lagu caddayn heshiiska wax-soo-saar wadaagga.
4) Xaddiga batroolka lagu cabiray faqradda 3aad ee kor ku xusan, waxaa laga jarayaa wasakhda laga saaray batroolka.
5) Xuquuqda lahaanshaha ma waajibayso xaaladaha soo socda:
   a) Batroolka lagu celiyay ceelka kadib oggolaanshaha Wasaaradda. Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxay waajibaysaa bixinteedu marka laga soo saaro ceelka.
   b) Muunadaha laga qaado batroolka la soo saaray si loo taxliiliyo, tijaabiyo ama loo baaro. Haddii la iibiyo muunadahaasi waxaa ku waajibaya bixinta xuquuqda lahaanshaha khayraadka.
   c) Batroolka ay ogolaatay Wasaaradda Batroolka si loogu isticmaalo:
      i. Qiiq ama wixii kale ee sun ah ama dhib dhalinaya ee xiriir la leh hawlaha batroolka; ama
      ii. Wax si toos ah loogu isticmaalay isla hawlaha soo saarista batroolka.
6) Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxaa la bixinayaa wakhtiga iyo qaabka loogu caddeeyey Cutubka 5-aad.

Qodobka 6aad: Meelmarinta Cashuurta Macaashka

1) Cidda ka shaqaynaya hawlaha batroolka waxaa ku waajibaya cashuurta macaashka siduu dhigayo (Sharci Lr. 5 ee soo baxay 5 Noofeembar 1966[ka]).
2) Cashuurta macaashka laga qaadayo cidda ku hawlan shaqada batroolka waxaa loo xisaabinayaa, laguna cashuurayaa sida uu sharcigaani dhigaayo. Xeerarka iyo xadidaadda ka duwan sharcigaan ee ku jira sharciga lagu xusay faqradda 1-aad laguma dabakhi karo.
3) Cashuurta macaashka ee laga qaadi karo dadka ku lugta leh hawlaha aan ahayn batroolka waxaa lagu xisaabinaya, laguna cashruurayaa Sharciga cashuurta macaashka shirkadaha. (Sharci Lr. 5 ee soo baxay 5 Noofeembar 1966[ka]).
4) Waa in la kala xisaabiyaa dakhliga ka soo xerooda iyo kharashaadka ku baxa hawlaha batroolka iyo kuwa aan batroolka ahayn ee shirkadda, si aan xisaab looga tegin.
5) Qiimaynta cashuurta sanadlaha shirkadda ku hawlan soo saarista batroolka waxaa lagu xisaabinayaa sida ku xusan faqradda 3aad ee jadwalka 1aad.

6) Xisaabinta cashuurta ku waajibaysa dakhliga shirkadda waxaa lagu salaynayaa dakhliga ka soo xarooda goobta ama ceelka laga soo saarayo batroolka ee ku wada yaalla hal xirmo. Xisaabinta ku saabsan khasaaraha ka go'aya dakhliga la cashuurayo waxaa loo raacayaa sida ku xusan Qodobka 7aad ee Sharcigan.
7) Marka la xisaabinayo cashuurta ku waajibtay dakhliga ka soo xerooda hawlaha batroolka waxaa loo xisaabinayaa sida soo socota:
    a) Goob ama ceel kasta waxaa loo tixgelinayaa inuu ka madax-bannaan yahay goobaha ama ceelasha kale oo ay ku wada yaallaan hal xirmo gudaheed, waxaana ku waajibaya cidda in ay diyaariso xisaabaadkiisa gaarka ah;
    b) qofka wuxuu xisaabanayaa dakhliga guud ee ka soo xarooday goobta ama ceelka, khasaaraha iyo cashuurta ku waajibtay goobtaas ama ceelkaas sanadkaasi.
8) Cidda agab ama qalab u adeegsada ceelal ama goobo kala duwan, waxaa loola dhaqmayaa in agabkaasi ama qalabkiisa uu iska iibiyay ama soo iibsaday xataa haddii lahaanshaha agabka ama qalabka uu qofku wareejiyay milkiyaddiisa uusan ka wareegin.
9) Haddii laba daraf ama ka badan ay ku shirkoobaan haysashada xuquuqda xirmo batrool, waxaa loo xisaabinaya mid kasta gaarkiisa.
10) Macaashka ka Dhasha kala iibsiga xuquuqda lahaansho ee xirma batrool waxaa lagu cashuurayaa 20%.
11) Qodobbada ku saabsan Isu-eexashada beec aan waafaqaysanayn beeca suuqa ayaa ku dhaqangalaya ganacsiga dhexmaray shirkado ganacsi wadaag ah:
    a) kuwaas oo ka fulinaya howlo batrool soo saaris goob, ceel ama sifeyn batrool la soo saaray iyo wixii kale oo howlo la xiriira ah; ama
    b) Macaamilka u dhaxeeya labo daraf iyo ka badan oo isla leh xuquuq batrool.

Qodobka 7aad: Howlaha Batroolka ee Kala Soocan

1) Howlaha batroolka ee khuseeya fulinta heshiis batrool waxaa loola dhaqmayaa in ay tahay mid gaar u taagan.
2) Marka goob kamid ah xirmo si gaar ah loogu asteeyo in laga soo saaro batrool:
    a) Howlaha batroolka ee laga fuliyay xirmada ka hor astaynta goob ka mid xirmada si looga soo saaro batrool iyo howlaha batroolka ee laga fuliyay goobtii la asteeyay kadib astaynta waxaa loo txigelinayaa in yihiin howl batrool laga fuliyay goob si gaar ah u astaysan.
    b) Haddii ay jiraan howlo batrool oo laga fulinayo isla xirmada balse ka baxsan goob horay si gaar ah loogu asteeyay in laga soo saaro batrool waxaa loola dhaqmayaa aag cusub.
3) Haddii ay shirkaddu ka baxdo ama celiso qayb ka mid ah xirmada isla markaasina laga fuliyay howl batrool kadib astaynta goob laga soo saarayo batrool; waxaa howlahaasi batrool loo qaddarinayaa in laga fuliyay goobta loo asteeyay in laga soo saaro batrool.
4) Wasaaradda Maaliydda oo masuul ka ah dakhliga, iyadoo la kaashanaya Wasaaradda ka masuulka ka ah arrimaha batroolka, waxay dejinayaa xeer-nidaamiyeyaal khuseeya
    a) Qeexidda ama cadaynaya howlaha batrool ee kala soocan; iyo
    b) Sida loo maareynayo Xirmooyinka deriska ah iyo mideynta xirmooyin. Kala xadaynta iyo isku dhafka xuquuqaha batroolka.

Qodobka 8aad: Dakhliga La Cashuuri Karo Iyo Khasaaraha Laga Goyn Karo

1) Cashuurta ku waajibta dakhliga ka soo xarooda goob ama ceel sanadkiiba waxaa loo xisaabinayaa dakhliga soo xarooday oo laga jaray isugeynta kuwa soo socda:

a) Kharashaadka sanadka ku baxay howlaha batroolka ee sanadkaas; iyo
b) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee la xiriira fulinta howlaha batroolka kuwaas oo xisaabtood laga soo guuriyay sanadihii la soo dhaafay.

2) Marka laga jarayo kharashaadka iyo khasaaraha dakhliga ka soo xarooday howlaha batroolka ee ku sheegan faqradda 1aad, waxaa marka ugu horraysa dakhliga laga jarayaa kharashaadka kadibna khasaaraha.
3) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee laga jarayo dakhliga kuna sheegan faqradda 1aad, xarafka (b) waa kharashaadka ku baxay goob ama ceel shidaal sanadkaas kuwaas oo ka bata dakhliga soo xarooday sanadkaas.
4) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee laga jarayo dakhliga kaasi oo laga guurinayo sanadihii la soo dhaafay wuxuu socon karaa muddooyinka hoose hadba tii soo horraysa:
   a) Haddii la wada bixiyo sanadkii la galay sida ku xusan faqradda 1aad, xarafka (b) ee qodobkan;
   b) muddo afar iyo toban (14) sano oo ka billaabanaysa marka la ogaado in khasaaraha la galay; ama
   c) Ilaa heshiiska wax-soo-saar wadaaggu dhammaanayo.
5) Waxaa reebban in khasaaro horay loo soo xisaabiyay lagana jaray dakhli in mar labaad laga jaro dakhli kale oo ka xarooday goob ama ceel shidaal.
6) Goob ama ceel kasta waxaa laga jarayaa keliya khasaarihiisa. Waxaa reebban in khasaaro khuseeya goob ama ceel shidaal laga jaro goob ama ceel kale oo shidaal ama dakhli ka yimaada howl aanan khuseyn howlaha batroolka.
7) Khasaaro ka yimaada howlo aanan khuseyn howlaha batroolka lagama jari karo dakhliga ka yimaada howlaha batroolka.

Qodobka 9aad: Dakhliga Ka Soo Baxa Deegaanada Kala Duwan ee Hawlaha Batroolka

1) Dakhli sanadeedka ee ka yimaada goob ama ceel shidaal waa isugeynta guud dakhliyada soo socda oo aan laga goyn kharash iyo khasaaro:
   a) Dakhliga guud oo ah isugeynta kharashka loo celiyay iyo faa'iidada batroolka ee ku soo aadda shirkad kana soo xarooda batroolkii la soo saaray laguna iibiyay qiimaha suuqa si waafaqsan qodobka 4aad faqradiisa 2aad ee jadwadlka 1aad
   b) Wixii dakhliga ka soo xarooda gedista hanti, ha ahaato mid guurto ama ma guurto ah oo ay ku jirto kala wareejinta xuquuqda batroolka, sida ku cad faqradda 4aad ee jadwalka 1aad.
   c) Dakhliga ka soo xerooday sanadkaasi bixinta adeegyo, xoggo ama agabyo lagu fulinayo howl batrool;
   d) Dakhli ka soo xerooday magdhow iyo lacagaha caymiska oo la xariira hawlaha qodista batroolka;
   e) Lacagta ku hartay sanduuqa dayactirka deegaanka aagga shidaalka, sida lagu cadeeyey Qodobka 13aad.
2) Dakhliga laga helo Aaladaha maaliyadeed sida dulsaarka raasamaalka iyo wixii la hal maala laguma darayo dakhliga ka soo xarooda goob ama ceel shidaal.

Qodobka 10aad: Kharashaadka Laga Goyn Karo Dakhliga

1) Kharashaadka ku sheeggan faqradda 2aad ee Qodobkaan waxaa laga jarayaa dakhliga sanadlaha ah ee ka soo xarooda goob ama ceel shidaal iyadoo la qaddarinayo shuruudaha soo socda:

a) In kharashka la galay sanadkaasi uuna si toos ah u khuseeyo howlaha batroolka;
b) Kharashkaasi yahay mid dib loogu celin karo shirkadda si waafaqsan heshiiska wax-soo-saar wadaagga; iyo
c) Kharash kasta oo aan lagu diidin Qodobka 10aad ee sharcigaan.

2) Kharashaadku waa:
a) Lacagaha la siiyey dawladda oo ay ku jiraan khidmad, xaquuqda lahaanshaha iyo cashuuraha aan ahayn macaashka;
b) Qiimaha ku baxay shaqada iyo hawlaha la qoondeeyey oo ay ka mid yihiin mushaaraadka oo ay ku jiraan gunnada shaqaalaha dawladda, qoondooyinka dib u dejinta shaqaalaha, daaweynta iyo caymiska nolosha iyo dakhliyada qofku jeebkiisa ka bixiyey ee dib loogu celinayo.
c) Qiimaha lagu soo iibiyey agabka, qalabka iyo sahayda;
d) Kharashka ku baxaya gaadiidka iyo shaqaalaha, qalabka, agabka iyo sahayda;
e) Karashaadka ku baxay adeegyada loo bahan yahay sida; korontada, biyaha, kharashaadka taleefonada oo ay fulinayaan gacan saddexaad oo laga soo iibsaday, waxaana ka mid ah qiimaynta kharashka, gudbinta xogta, sumadayn, sahanka, kormeerka iyo talooyinka la xiriira dhulka, injineernimada, kimisteriga, waxyeelada deegaanka, xisaabaadka, xisaab xirka, sharciga, maamulka shaqaalaha, qandaraasyada iyo alaabta lasoo iibsaday
f) Qarashaadka guud ee ku baxaya maamulka, waa inuusan ka badan karin 1% kharash sanadeedka qaybaha kale;
g) kharashaadka caymiska, dayactirka, bedellaadda ama bakhaarada lagu kaydinayo qalabka iyo sahayda;
h) Qoondooyinka loo meel mariyey in meel loo dhigo sanduuqa dayactirka deegaanka ee aagga laga qodayo batroolka;
i) Kharashka dheeriga ka noqda marka la isticmaalay qoondooyinka loo meel mariyey sanduuqa dayactirka deegaanka laga qodayo batroolka;
j) Qoondada dhiirigelinta Maalgashiga sanadle ee la ogolaaday iyadoo la tix gelinayo xuquuqda batroolka ee ku habboon sida ku xusan faqrada 4aad ee Jadwalka 1aad; iyo
k) Kharashaadka kale ee lagama maarmaanka ah ee lagu bixiyey aagagga la kala soocay ee hawlaha shidaalka.

3) Kharashaad kasta ha ahaado mid rasaamaaliya ama aanan ahayn waa laga jarayaa.

Qodobka 11aad: Kharashaadka Aan Laga Goyn Karin

Wax yaabahan soo socda ma noqon karaan kharashaad laga jari karo:

1) Kharashka Qiime dhaca ku yimaadda qalabka;
2) Kharashka lagu iibsaday xuquuqda batroolka oo ay ku jiraan qiimaha rasmiga ah ee lagula kala wareegay, lagu kala iibsaday, khasaarihii ka dhashay kala iibsiga iyo khidmooyinkii lagu bixiyey qareennada iyo wixii dheeraad ah ee lagu bixiyey xuquuqaha kala duwan ee batroolka, laakiin qodobadaani ma quseeyaan waxa uu cadaynayo Qodobka 9aad farqadiisa 2aad (j) ee Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha;
3) Kharashka dulsaarka raasamaalka iyo wixii la hal maala sida ku cad sharciga caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
4) Xaquuqda lahaanshaha;
5) Kharashaaadka lagu iibsado qayb ka mid ah xuquuq batrool;
6) Kharash kasta oo ka badnaada xadka uu dhigay qodobka 11aad farqadiisa 5aad; iyo

7) Xaddiga lagu caddeeyey faqradda 2aad ee Jadwalka 3aad.
8) Lacagaha shirkaduhu bixiyeen markay ku guulaysteen qandaraaska (Gunnada heshiis saxiixidda).

Qodobka 12aad: Xisaabaadka

1) Haddii aan si kale loogu cadayn sharcigaan, qadar-lacageedka lagu darayo ama laga goynaayo marka la xisaabinaayo dakhliga la cashuuri karo ee aagagga lakala saaray ee hawlaha batroolka waa in uu noqdo:
   a) Mid lagu xisaabiyo qaab xisaabeed waafaqsan Sharciga Caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
   b) Mid dib loogu sixi karo wixii khaladaad xisaabeed ah ee soo baxa.
2) Faqradda 1aad laguma maamulayo dakhliga ka soo baxa batroolka soo baxay.
3) Cadadka lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga la qaadi karo iyo hantida loo isticmaalay xaqiijinta dakhliga waa in loo qoondeeyaa si sax ah oo ah sidaan soo socota:
   a) Wax ka badan hal aag oo aagagga la kala saaray ee hawlaha batroolka; ama
   b) Hawlaha lagu fulinayo batroolka iyo adeegyada kale ee aan batroolka ahayn. Gaar ahaan, Haddii batroolka lagu iibiyey qiime ka badan qiimaha suuqa, sida lagu cadeeyey faqradda 2aa ee Jadwalka 1aad, wixii dheeri ku ah qiimaha waxaa loo kala qaybinayaa hawlaha batroolka iyo hawlaha aan batroolka ahayn, waana la cashuurayaa iyadoo qayb ka ah dakhliga la soo dallacayo ee howlahaas.
4) Marka la xisaabinayo cashuuraadka iyo dakhliga hawlaha batroolka waxaa lagu darayaa wixii ka soo baxa habka kala iibsiga laba shirkadood oo is leh oo aan waafaqsanayn qiimaha suuqa, haddii uu yahay dakhli iyo hadduu yahay qarash, sida lagu cadeeyey faqradda 3aad.
5) Haddii laba daraf/Shirkadood oo Isku dan oo kawada shaqaynaya laba aag oo hawlaha batroolka ah ay kala iibsadaan hanti, khidmad iyo adeegyo kale oo ay isa siiyaan wixii macaash ah ee dhexdooda ay kala helaan looma xisaabinayo cashuur ahaan.
6) Ujeedada faqradda 5aad waa; mamnuucidda eexda dhexmarta laba shirkadood oo isleh oo ka wada shaqaynaya aagga batrool (iyagoo ka baxsanaya ama dhimaya cashuurta dawladda).

Qodobka 13aad: Kala Wareejinta Xuquuqaha Batroolka ee Toosan Iyo Kuwa Dadban

1) Marka la go'aaminayo qiimaha lagu kala iibsanayo xuquuqaha waxaa ku jira gadistii, iyadoo uu la socdo xuquuqdii lahaanshuhu, taasoo ah:
   a) Cadadka hadda la kala qaatay iyo kuwa lagu balamay in la kala qaadan doono ayaa la xisaabinayaa; iyo
   b) Cadadka la kala qaadan doono ee lagu balamay wax ka badan hal sano oo mustaqbalka ah, cadadkaas waxaa lagu qiimaynayaa qiimaha ay markaas suuqa ka joogaan saamiyada wax lagu kala gatay, iyadoo la isticmaalayo habraaca ku haboon.
2) Cadadka lagu go'aamiyey faqradda 1aad waxaa loola dhaqmayaa qayb ka mid ah qiimaha lagu bixiyey iibsashada iyo helitaanka xuquuqda batroolka.
3) Haddii shirkad haysata xuquuqda batroolka ay gaddo 25 boqolkiiba ama ka badan, isbeddelka ku yimaada lahaanshaheeda aasaasiga ah ee hay'adda waxaa loola dhaqmayaa sidii inay saamiyada xuquuqdeeda batrool aanay is beddelin.
4) Marka lagu dhaqmayo faqrad 3aad shirkadda waxaa loola dhaqmayaa sidan;
   a) In ay shirkaddu qiimahay ku gadday uusan bedelayn saamigeedii rasmiga ahaa ee boqolayda, iyo

b) Kharashaadka ay shirkaddu bixisay isaguna ma bedelayo boqolayda saamiga hantiyadeed ee shirkadda.

5) Shirkad ujeedkeedu yahay inay beddesho saamigeedii sida lagu cadeeyey faqradda 3aad, waa in ay faahfaahin dheeraad ah siisaa Wasaaradda Maaliyadda ee masuulka ka ah arrimaha Dakhliga isbeddelkaas 30 maalmood gudahood xilligay isbedelka samaynayso.

6) Shirkadii ku guuldaraysata inay wargeliso Wasaaradda Maaliyadda ee masuulka ka ah arrimaha Dakhliga mudadaan 30 maalmood ah waxaa lagu ganaaxayaa ciqaab u dhiganta 30 boqolkiiba qiimaha suuqa uu ka joogo saamiga ay shirkaddu gadday.

Qodobka 14aad: Sanduuqa Loo Qoondeeyey Dayactirka Deegaanka

1) Sanduuqa dayactirka deegaanka loo qoondeeyey oo qayb ka ah qorshaha qodista iyo horumarinta lama cashuurayo.

2) Qandaraasleyaasha batroolka waa inay bixiyaan saddexdii biloodba mar qoondadii lagu maal gelinayey sanduuqa dayactirka deegaanka iyada oo laga bilaabaayo marka qandaraasluhu helo ruqsadda uu ku hawl galaayo ama ogolaanshaha lagu dhoofinaayo batroolka lasoo saarey.

3) Lacagta ku harta sanduuqa dayactirka deegaanka marka la isticmaalay kadib waxay qayb ka noqonaysaa dakhliga ka soo xerooday shaqada, marka u go'aamiyo:
   a) Wasaaradda masuulka ka ah
   b) Cidda masuulka ka ah arrimaha batroolku uu cadeeyo in shaqadaas la dhameeyey, shirkadaasina xaq u leedahay wixii ku haray sanduuqa; ama
   c) Wasaaraddu waa in ay caddeeysaa in shirkadaasi ay jebisay heshiiskii wax ka qabashada deegaanka ee ay ku maamuli lahayd sanduuqa dayactirka deegaanka.

4) Lacagta laga bixiyay sanduuqa dayactirka deegaanka si loogu qabto shaqada dayac tirka deegaanka kama mid ah dakhliga shirkadda laga cashuurayo.

CUTUBKA 3AAD: MACDANTA

Qodobka 15aad: Waajibinta Xuquuqda Lahaanshaha Kheyraadka

1) Cid kasta oo haysta xuquuqaha soo saarista macdanta waxaa ku waajibay in uu bixiyo xuquuqda lahaanshaha khayraadka ka hor celista kharashka iyo wadaageeda faa'iidada.

2) Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxaa loo xisaabinayaa xaddiga lagu asteeyey faqradda 1aad ee jadwalka 1aad ee macdanta la soo saaray sida ku cad faqradda 2aad ee jadwalka 2aad.

3) Qiyaasta macdanta la soo saaray waxaa lagu cabirayaa: -
   a) Goobta cabirka sida ku cad heshiiska wax-soo-saar wadaagga qodista macdanta; ama
   b) Goobta ay go'aamiso Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta haddii aan lagu caddayn heshiiska wax-soo-saar wadaagga.

4) Xaddiga macdanta lagu cabiray ee ku cad faqradda 3aad, waxaa laga jarayaa wasakhda laga saaray macdanta la soo saaray.

5) Muunadaha baaritaanka macdanaha ee ay meel marisay Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta oo masuul ka ah arrimaha macdantu ee loo adeegsaday tijaabada ama waxyaalaha kale ee baaritaan lagama rabo dakhliga lahaanshaha cashuurta. Haddiise la iibiyo waxaa ku waajibaysa dakhliga dawladda ee lahaanshaha khayraadka.

6) Xuquuqda lahaanshaha macdanta waxaa lagu bixinayaa wakhtiga iyo qaabka lagu caddeeyey Cutubka 5aad.

7) Haddii tayada macdanta lasoo saaray ay hoos ugu dhacdo tii la filayey Wasaaradda Maaliyadda ayaa soo saareysa xeernidaamiye qeexayaa xaquuqda lahaanshaha macdanta, mugga iyo qiimaha.
8) Qalabka dhismaha, waxaa loola jeedaa dhagaxa, nuradda, quruuruxa/jaygta, ciidda iyo wixii macadam ah ee la mid ah oo xeerku cadaynayo.

Qodobka 16aad: Meelmarinta Cashuurta Macaashka Shirkadaha

1) Cidda ka shaqaynaya hawlaha batroolka waxaa ku waajibaya cashuurta macaashka si waafaqsan Sharci Lr. 5 ee soo baxay 5 Noofeembar 1966ka.
2) Cashuurta macaashka laga qaadayo Cidda ku hawlan shaqada macdanta waxaa loo xisaabinayaa, laguna cashuurayaa sida uu sharcigaani dhigaayo. Xeerarka iyo xadidaadda ka duwan sharcigaan ee ku jira sharciga lagu xusay faqradda 1aad laguma dabbaqi karo.
3) Cashuurta macaashka ee laga qaadi karo dadka ku lugta leh hawlaha aan ahayn macdanta waxaa lagu xisaabinaya, laguna cashruurayaa Sharciga cashuurta macaashka shirkadaha. (Sharci Lr. 5 ee soo baxay 5 Noofeembar 1966ka).
4) Waa in la kala xisaabiyaa dakhliga ka soo xerooda iyo kharashaadka ku baxa hawlaha macdanta iyo kuwa aan macdan ahayn ee shirkadda, si aan xisaab looga tegin.
5) Qiimaynta cashuurta sanadlaha shirkadda ku hawlan soo saarista macdanta waxaa lagu xisaabinayaa sida ku cad faqradda 3aad ee jadwalka 2aad.
6) Xisaabinta cashuurta ku waajibaysa dakhliga shirkadda waxaa lagu salaynayaa dakhliga ka soo xarooda goobta ama ceelka laga soo saarayo macdanta ee ku wada yaalla hal xirmo. Xisaabinta ku saabsan khasaaraha ka go'aya dakhliga la cashuurayo waxay loo raacayaa sida ku cad Qodobka 17aad ee Sharcigaan.
7) Marka la xisaabinayo cashuurta ku waajibtay dakhliga ka soo xerooda hawlaha macdanta waxaa loo xisaabinayaa sida soo socota:
    a) Goob ama ceel kasta waxaa loo tixgelinayaa inuu ka madax-bannaan yahay goobaha ama ceelasha kale ee ay ku wada yaallaan hal xidhmo gudaheed, waxaana ku waajibaya qofka in ay diyaariso xisaabaadkiisa gaarka ah;
    b) qofka wuxuu xisaabanayaa dakhliga guud ee ka soo xarooday goobta ama ceelka, khasaaraha iyo cashuurta ku waajibtay goobtaas ama ceelkaas sanadkaasi.
8) Cidda agab ama qalab u adeegsada ceelal ama goobo kala duwan, waxaa loola dhaqmayaa in agabkaasi ama qalabkiisa uu iska iibiyay ama soo iibsaday xataa haddii lahaanshaha agabka ama qalabka uu qofku wareejiyay milkiyaddiisa uusan ka wareegin.
9) Haddii laba daraf ama ka badan ay ku shurkoobaan haysashada xuquuqda lahaansho xidhmo macdan, waxaa loo xisaabinaya mid kasta gaarkiisa.
10) Macaashka ka Dhasha kala iibsiga xuquuqda lahaansho ee xidhma macdan waxaa lagu cashuurayaa 20%.
11) Jadwalka 3aad farqada (J) ee ku saabsan beeca eexda ayaa ku dhaqangalaya ganacsiga dhexmaray shirkado ganacsi wadaag ah:
    a) kuwaas oo ka fulinaya howlo macdan soo saaris goob, ama ceel yo wixii kale oo howlo la xiriira ah; ama
    b) Macaamilka u dhaxeeya labo qof iyo ka badan oo isla leh xuquuq macdan.

Qodobka 17aad: Hawlaha Macdanta ee Kala Soocan

1) Howlaha macdanta ee khuseeya fulinta heshiis macdan waxaa loola dhaqmayaa in ay yihiin mid gaar u taagan.
2) Marka goob kamid ah xidhmo si gaar ah loogu asteeyo in laga soo saaro macdan:

a) Howlaha macdanta ee laga fuliyay xidhmada ka hor astaynta goob ka mid xidhmada si looga soo saaro macdan iyo howlaha macdanat ee laga fuliyay goobtii la asteeyay kadib astaynta waxaa loo tixgelinayaa in yihiin howl macdan laga fuliyay goob si gaar ah u astaysan.

b) Haddii ay jiraan howlo macdan oo laga fulinayo isla xidhmada balse ka baxsan goob horay si gaar ah loogu asteeyay in laga soo saaro macdan waxaa loola dhaqmayaa aag gaar ah.

3) Haddii ay shirkaddu ka baxdo ama celiso qayb ka mid ah xidhmada isla markaasina laga fuliyay howl macdan kadib astaynta goob laga soo saarayo macdan; waxaa howlahaasi macdan loo qaddarinayaa in laga fuliyay goobta loo asteeyay in laga soo saaro macdanta.

4) Wasaaradda Maaliyadda oo masuul ka ah Dakhliga, ayadoo la kaashanaya Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta masuulka ka ah Arrimaha Macdanta, waxay dejinayaa xeer-nidaamiyeyaal khuseeya:

a) Qeexidda ama cadaynaya howlaha macdanta ee kala soocan;iyo

b) Sida loo maaraynayo Xidhmooyinka deriska ah iyo mideynta xidhmooyin.

c) Kala xadaynta iyo isku dhafka xuquuqaha macdanta.

Qodobka 18aad: Dakhliga La Cashuuri Karo Iyo Khasaaraha Laga Goyn Karo

1) Cashuurta ku waajibta dakhliga ka soo xarooda goob ama ceel sanadkiiba waxaa loo xisaabinayaa dakhliga soo xarooday oo laga jaray isugeynta kuwa soo socda:

a) Kharashaadka sanadka ku baxay shaqada qodista ee sharcigu ogol yahay; iyo

b) Khasaaraha la oggolaaday ee ka dhashay shaqada la fuliyey sanadka, iyadoo lagu darayo khasaarooyinkii sanadihii ka horeeyey.

2) Marka laga jarayo kharashaadka iyo khasaaraha dakhliga ka soo xarooday howlaha macdanta ee ku sheeggan faqradda 1aad, waxaa marka ugu horraysa dakhliga laga jarayaa kharashaadka kadibna khasaaraha.

3) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee laga jarayo dakhliga kuna sheeggan faqradda 1aad, xarafka (b) waa kharashaadka ku baxay goob ama ceel macdan sanadkaas kuwaas oo ka bata dakhliga soo xarooday sanadkaas.

4) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee laga jarayo dakhliga kaasi oo laga guurinayo sanadihii la soo dhaafay wuxuu socon karaa muddooyinka hoose hadba tii soo horraysa:

a) Haddii la wada bixiyo sanadkii la galay sida ku xusan faqradda 1aad, xarafka (b) ee qodobkan;

b) muddo afar iyo toban (14) sano oo ka billaabanaysa marka la ogaado in khasaaraha la galay; ama

c) Illaa heshiiska wax soosaar wadaaggu dhammaanayo.

5) Waxaa reebban in khasaaro horay loo soo xisaabiyay lagana jaray dakhli in mar labaad laga jaro dakhli kale oo ka xarooday goob ama ceel macdan.

6) Goob ama ceel kasta waxaa laga jarayaa keliya khasaarihiisa. Waxaa reebban in khasaaro khuseeya goob ama ceel macdan laga jaro goob ama ceel kale oo macdan ama dakhli ka yimaada howl aanan khuseyn howlaha macdanta.

7) Khasaaro ka yimaada howlo aanan khuseyn howlaha macdanta lagama jari karo dakhliga ka yimaada howlaha macdanta.

Qodobka 19aad: Dakhliga Ka Soo Baxa Deegaannada Kala Duwan Ee Hawlaha Macdan Qodista

1) Dakhliga sanadle ee ka soo baxa aagagga kala duwan ee macdanta qofku (shirkaddu) qodayso

waa isu geynta qiimayaashaan soo socda oo aan waxba laga goynayn:

a) Qiimaha suuqa ay ka joogto macdanta la soo saaray sanadkaas, iyadoo laga soo bilaabayo markii hawsha la bilaabay sida uu cadaynayo Qodobka 14 iyo qiimaha lagu cadeeyey faqradda 2 ee jadwalka labaad.
b) Lacagta guud ahaan laga helay inta lagu guda jiray sanadka gudihiisa hawlaha macdanta , oo ay ku jiraan xuquuqaha la xiriira macdanta, ha ahaato hanti guurto ama maguurto.
c) Khidmada iyo qiimayaasha kale ee laga qaadayo sanadka ee ka imanaya adeegyada, xogaha ama adeegyada kale ee lagu bixiyey hawl galka;
d) Magdhowga iyo habraacyada caymiska lagu bixinayo wakhtiga sanadka lagu jiro iyadoo loo eegayo hawl galka shaqada;
e) Iyadoo la tix gelinayo in wixii ka soo kordha sanduuqa dayactirka deegaanka, wixii qiime ah ee lagu cadeeyey qodobka 23.

2) Waxaan soo hoos gelayn faqradda 1aad ee kor xusan dakhliga laga helo dulsaarka raasamaalka iyo wixii la hal maala.

Qodobka 20aad: Kharashaadka Laga Goyn Karo Dakhliga

1) Kharashaadka ku sheeggan faqradda 2aad ee Qodobkaan waxaa laga jarayaa dakhliga sanadlaha ah ee ka soo xarooda goob ama ceel macdan iyadoo la qaddarinayo shuruudaha soo socda:
   a) In kharashka la galay sanadkaasi uuna si toos ah u khuseeyo howlaha macdanta;
   b) Kharashkaasi yahay mid dib loogu celin karo shirkadda si waafaqsan heshiiska wax soosaar wadaagga; iyo
   c) Kharash kasta oo aan lagu diidin Qodobka 10 ee sharcigaan.
2) Kharashaadku waa: -
   a) Lacagaha la siiyey dawladda oo ay ku jiraan mushaharooyinka, lahaanshaha dakhli iyo cashuurta ka baxsan cashuurta macaashka;
   b) Qiimaha ku baxay shaqada iyo hawlaha la qoondeeyey oo ay ka mid yihiin gunooyinka la siinayo shaqaalaha, faa'iidooyinka shaqaalaha ee dawladda, qoondooyinka, caymiska caafimaadka, nolosha iyo dakhliyada dib loo bixinayo;
   c) Qiimaha lagu soo iibiyey agabka, qalabka iyo geynta;
   d) Kharashka ku baxaya gaadiidka iyo shaqaalaha, qalabka, agabka iyo geynta sahayda;
   e) Qiimaha adeegyada loo bahan yahay ku baxaya iyo waxyaalaha ku baxaya qayb saddexaad oo agab keenista ka shaqaynaysa oo ay ku jiraan qiimaynta kharashaadka, hagaajinta xogta, jaangoynta, sahanka, kormeerka iyo talooyinka la xiriira dhulka, injineernimada, kimisteriga, waxyeelada deegaanka, xisaabaadka, xisaab xidhka, sharciga, maamulka shaqaalaha, qandaraasyada iyo alaabta la iibinayo;
   f) Qiimaha ku baxaya maamulka, laakiin aan inuusan ka badan karin 1% kharash sanadeedka qaybaha kale
   g) Kharashaadka caymiska, dayactirka, bedellaadda ama agabyada kaydinta, qalabka iyo sahayda;
   h) Qoondooyinka loo meel mariyey in meel loo dhigo sanduuqa dayactirka deegaanka ee aagga laga qodayo macdanta.
   i) Kharashka dheeriga ka noqda marka la isticmaalay qoondooyinka loo meel mariyey sanduuqa dayactirka deegaanka laga qodayo macdanta;
   j) qoondooyinka dhiirigelinta maalgashigasanadle ee la ogolaaday iyadoo la tix gelinayo xuquuqda macdanta ee ku habboon sida ku cad faqrada 4 ee Jadwalka Koowaad; iyo
   k) Kharashaadka kale ee lagama maarmaanka ah ee lagu bixiyey aagagga kala duwan ee

macdanta laga qodayo.

3) Kharashaad kasta ha ahaado mid rasaamaaliya ama aanan ahayn waa laga jarayaa.

Qodobka 21aad: Kharashaadka Aan Laga Goyn Karin

1) Waxyaabahan soo socda ma noqon karaan kharashaad laga jari karo:
   a) Qiime dhaca;
   b) Kharash horey loogu darey qiimaha xuquuqda macdanta lagu iibsedey, sida qimaha laga bixiyey shatiga, sii heysashada shatiga, horumarinta aaga shatiga, kharashka ku baxa dacwad ku sahabsan shatiga ama iibinta shatiga, iyo gunooyin loo bixiyey shatiga dartii. Laakiin qodobkani mahorjoogsanaayo ku dhaqanka Qodobka 20 (2)(j) ee ku sahabsan gunnada raasamaalka.
   c) Kharashka lagu bixiyey adeegyada maaliyadda sida dulsaarka ama lamacna ah iyadoo latixraacayo sharciga caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
   d) Xuquuda Lahaanshaha ee mudnaanta leh;
   e) Kharash lagu bixiyey si loogaga helo shirkadda macdanta lacag faa'iido joogta ah iyo wixii la mid ah;
   f) Kharsh wixii dheeri ka ah xaddiga lacageed ee uu cadeeyey Qodobka 21 (5); iyo
   g) Kharashka Xaddiga lagu cadeeyey faqradda 2aad ee Jadwalka 3aad.
   h) Saxiixa gunnooyinka

Qodobka 22aad: Xisaabaadka

1) Haddii aan si kale loogu cadayn sharcigan, xisaabta lagu darayo ama laga goynayo marka la xisaabinayo dakhliga la cashuuri karo ee aagagga kala duwan ee laga qodayo macdan waa in uu noqdo:
   a) Mid Lagu xisaabiyo qaab xisaabeed waafaqsanna Sharciga Caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
   b) Mid dib loogu sixi karo wixii khaladaad xisaabeed ah ee soo baxa.
2) Faqradda 1aad laguma maamulayo dakhliga caadiga ah ee ka soo xerooday macdanta soo baxday.
3) Qaddarka lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga la qaadi karo iyo hantida loo isticmaalay bixinta dakhliga la soo saari karo waa in loo qoondeeyaa halka ay si sax ah ugu xiran yihiin-
   a) Wax ka badan hal aag oo aagagga loo kala duway ee hawlaha macdanta; ama
   b) Hawlaha lagu fulinayo macdanta iyo adeegyada kale ee aan macdanta ahayn.

Khaas ahaan, haddii macdanta lagu iibiyey qiime ka badan qiimaha suuqa waxaa lagu cadeeyey faqradda 2aad ee Jadwalka 2aad, wixii xad dhaaf ah waxaa loo qoondeeyay in lagu bixiyo adeegyada aan macdanta ah, waana la cashuurayaa iyadoo qayb ka ah dakhliga la soo dallacayo ee howlahaas

4) Sharciyada laba shirkadood oo is ahi wax ku kala iibsanayaan waxaa lagu dabaqayaa qimaha lagu daray ama laga gooyey ee xisaabta dakhliga laga qaadi karo ee aagagga hawlaha qodista macdanta ee la kala saaray iyo qayb kastoo ku xusan faqradda 3aad.
5) Haddii qofka masuulka ka ah aagagga kala soocan ee macdanta uu ku shaqeysiiyo qof eey is leeyihiin, ka iibsado hanti, ama adegya kale ee lagu fulinayo hawsha, wax kastoo kharash ah oo laga jarayo dakhliga shirkadda oo uu qofkaasi qaadanaayo faa'iidada inuu kahelo looma ogola.
6) Ujeedooyinka faqradda 5aad, cadadka faa'iido la'aanta ah caadi ahaan waa qiimaha qofka loo xilsaaray hawlaha uu ku bixinayo shaqooyinka ku baxaya hantida, adeegyada ama hawlaha,

laakiin kuma jiraan kharashaad kasta oo ku baxay cidda kale uu si gaar ah ugu eexday.

Qodobka 23aad: Kala Wareejinta Xuquuqaha Macdanta Ee Toosan Iyo Kuwa Dadban

1) Haddii qofka u haysta ruqsadda macdanta raadinta la siiyo ruqsada qodis, ruqsadaasi waxay u ogolanaysaa inuu ka qodi karo xidhmadii uu ruqsadda raadinta macdanta u haystay; Waxaana faahfaahinaya qodobadaan soo socda:
   a) Lagama soo qaadayo qofkaas inuusan gadayn qayb ka mid ah ruqsadiisa
   b) Cashuur dhaafka ay ruqsadaasi xaqa u leedahay waxaa loo kala qaybinayaa qaybta lahaanshaheeda uu weli haysto iyo qaybtuu gaday.
   c) Wixii ka danbeeya sanadkaas cashuur dhaafka loo qaybiyey labada aag, mid kasta gaarkeeda ayaa loo cashuurayaa.
   d) Kharashka lagu gatay ruqsadda ayaa lagu qiimaynayaa cashuurta.
2) Wasiirka masuulka ka ah dakhliga, isagoo la kaashanaya wasiirka masuulka ka ah arrimaha macdanta, wuxuu dejinayaa xeer-hoosaad hoos imanaya faqradda 1aad.
3) Marka la go'aaminayo qiimaha lagu kala iibsaday-xuquuqda macdanta oo ay ka mid tahay lahaanshaha dakhliga dawladda, waxaa loola dhaqmayaa sidan:
   a) Qiimaha ama faa'iidooyinka la kala qaadanayo mustaqbalka wakhtiga la joogo ayaa xisaabta lagu darayaa.
   b) Marka cadadkaas ama faa'iidooyinkaas la doonayo in la helo, wax ka badan hal sano mustaqbalka, waxaa lagu qiimaynayaa qiimaha eey markaas suuqa ka joogaan, iyadoo la isticmaalayo habraac qiime ku habboon.
4) Cadadka lagu go'aamiyey faqradda 3aad waxaa loola dhaqmayaa qayb ka mid ah qiimaha lagu bixiyey iibsashada iyo helitaanka xuquuqda macdanta.
5) Haddii hay'ad haysata xuquuqda macdanta ay gaddo 25 boqolkiiba ama ka badan, isbeddelka ku yimaada lahaanshaheeda aasaasiga ah ee hay'adda waxaa loola dhaqmayaa sidii inay saamiyada xuquuqdeeda macdan aanay is bedelin.
6) Marka lagu dhaqmayo faqrad hoosaadka 5) shirkadda waxaa loola dhaqmayaa sidan:
   a) Waxaa loola dhaqmayaa inay shirkaddu qiimahay ku gadday uusan bedelayn saamigeedii rasmiga ahaa ee boqolayda, iyo
   b) Kharashaadka ay shirkaddu bixisay isaguna ma bedelayo boqolayda saamiga hantiyeed ee shirkadda.
7) Shirkad ujeedkeedu yahay inay bedesho saamigeeda sida lagu cadeeyey faqradda 5aad waa in ay faahfaahin dheeraad ah siisaa Hay'adda dakhliga cashuuraha isbedelkaas, waana inay ku ogaysiisaa muddo 30 maalmood gudahood xilligay isbedelka samaynayso.
8) Hay'adda ku guuldaraysata inay ogeysiiso Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga muddo 30 maalmood ah gudahood, waxaa lagu ganaaxayaa 30 boqolkiiba qiimaha suuqa uu ka joogo saamigay gadday.

Qodobka 24aad: Sanduuqa Loo Qoondeeyey Dayactirka Deegaanka

1) Sanduuqa dayactirka deegaanka loo qoondeeyey oo qayb ka ah qorshaha qodista iyo horumarinta macdanta, lama cashuurayo.
2) Qandaraasleyaasha macdanta waa inay shubaan saddexdii biloodba mar qoondadii lagu maal gelinayey sanduuqa dayactirka deegaanka iyada oo laga bilaabaayo marka qandaraasluhu helo ogolaanshaha uu ku hawl galaayo ama ogolaanshaha lagu dhoofinaayo macdanta lasoo saarey
3) Lacagta ku hadha sanduuqa dayactirka deegaanka marka la isticmaalay kadib waxay qayb ka noqonaysaa dakhliga ka soo xerooday shaqada, marka: -

a) Wasiirka masuulka ka ah arrimaha macdanta uu cadeeyo in shaqadaas la dhameeyey, shirkadaasina xaq u leedahay wixii ku hadhahay sanduuqa; ama
b) Wasiirku inuu caddeeyey in shirkadaasi ay jebisay heshiiskii wax ka qabashada deegaanka ee ay ku maamuli lahayd sanduuqa dayactirka deegaanka.

4) Lacagta laga bixiyay sanduuqa dayactirka deegaanka si loogu qabto shaqada dayac tirka deegaanka kama mid ah dakhliga shirkadda laga cashuurayo.

CUTUBKA 4AAD: HEESHIISYADA QODISTA KHAYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

Qodobka 25aad: Dhowrista Heshiisyada Qodista Khayraadka Dhulka Hoostiisa

1) Marka laga soo tago sida ku cad qodobkaan ama si kale loogu cadeeyey xeerarka sharciyada cashruuraha, heshiisyada qodista kheyraadka dhulka hoostiisu saamayn kuma lahan sharciga dakhliga.
2) Iyadoo la tixraacayo Qodobka 27 (3) ee xeerkan, wuxuu khuseeyaa keliya;-
   a) Marka wasiirka masuulka ka ah dakhliga uu cadeeyo saxnaanta iyo run ahaanta nuqulka heshiiska qodista kheyraadka dhulka hoostiisa uuna u gudbiyo nuqul ka mid ah hayadda maamulka dakhliga; iyo
   b) Cidda ku qoran qandaraas qodista khayraadka dhulka hoostiisa waa inuu yahay ciddii/shirkada saxda ahayd ee ku qoran heshiiska.
3) Hay'adda masuulka ka ah dakhligu waxay ku dhaqmaysaa sharciga maamulka dakhliga iyadoo tix gelinaysa:
   a) Qodobka degananshaha maaliyadeed ee lagu heshiiyey ee ku jira heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa (arag qodobka 25); iyo
   b) Cashuur dhaaf uu bixiyay maamul goboleed ama dawlad hoose oo ku qeexnaa heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa (arag Qodobka 26).

Qodobka 26aad: Xuquuq Maaliyadeedka Lagu Heshiiyey Ee Aan Is Bedelin

1) Hadii dhaqan galka heshiiska kadib;
   a) Dawladda Soomaaliya ay sharciyeyso cashuur hore aan u jirin Cashuurtaa oo ku waajibeysa kaliya shirkadaha ka shaqeeya batroolka iyo macdanta.
   b) Isbeddel ku yimaaddo Shuruucda dalka (ama Fasiraadda Shuruucda Dalka) taas oo
      i. Saameyn dhaqaale kule Shirkadaha batroolka iyo macdanta
      ii. ama lagu beegsado qandaraaslayaasha ka shaqeysta batroolka/macdanta, iyo
   c) iyada oo arimahaa ku xusan (a) iyo/ama (b), eey ka dhalatey dhaqaala xumo baaxad leh oo soo foodsaartey shirkadaha ka shaqeysta batroolka iyo/ama macdanta tusaale ahaan hoos u dhac kuyim faaiidadii eey ka heli jireen shaqada batroolka iyo/ama macdanta,
2) Shirkadu waxey qoraal ahaan ku wargelini wasaaradda batroolka arintani waxeyna qorsheynayaa kulan dhexmara labadooda mudo (90) maalmood gudaheed ah kulankaas oo ujeedkiisu yahey in laxaliyo dhibta dhaqeele-xume ee shirkada kasoo gaadhey cashuurtaa cusub ee dawladdu soo rogtey kuna gaaryeeshey shirkadaha ka shaqeeya batroolka/macdanta.
3) Hadii marka kulanku dhexmaro shirkadda iyo wasaaradda eey is-afgarani waayaan ama ku guuldareystaan iney wada-gaadhaan heshiis, Shirkadda waxaa u banaan in eey furato gal-dacwadeed dhexdhexaadin.
4) Faqradahani kor kuxusan waxaa shardi u ah in cashuurta lasoo rogey lagu koobey kaliya shirkadaha ka shaqeeya batroolka iyo/ama macdanta.
5) Waxa kale oo shardi u ah in khasaaraha dhaqaale ee shirkadda kasoo gaadhey cashuurta lasoo rogey uu kor u dhaafo $1,000,000 (hal milyan oo dolarka mareykanka ah); hadii shirkadda lagula

heshiiyo in loo magdhawo khasaarihii kasoo gaadhey sanadka, cashuurta lasoo rogey awgeed, waxa la magdhabayaa kaliya wixii dheeri ka ah ee kor u dhaafsan $1,000,000 (hal milyan oo dolarka mareykanka ah). Taas macneheedu waa khasaaraha $1,000,000 (hal milyan oo dolarka mareykanka ah) ee ugu horeeya lama magdhabaayo.

6) Faqraddani uma fasaxeyso shirkadaha in ay shuruucda dalka baalmaraan. Shuruucdaasi ha ahaadaan kuwo loo jideeyey si loogu daryeelo caafimaadka iyo bad qabka shaqaalaha ama bii'ada ama ha ahaadaan shuruuc iyo xeerhoosaadyo loogu talo-galey daryeelka hantida iyo dadka Soomaaliyeed.

Qodobka 27aad: Cashuur Dhaafka Ay Samaynayaan Dawladda Federaalka, Dawlad Goboleedyada Iyo Dowladaha Hoose

1) Si waafaqsan Qodobka 24aad ee Sharcigan:
   a) Dawlad Goboleedyada iyo Dawladaha Hoose waa inay u hoggaansamaan cashuur dhaafka loo sameeyey shirkadaha ee lagu qeexay heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa.
   b) Shirkadaha ku hawlan baadhista iyo qodista Batroolka waxa ay la soo degaan inta ay ku jiraan hawlaha baadhista iyo qodista lagama qaadayo cashuur. Markay bilaabaan wax soo saaraka cashuur dhaafkani wuu joogsanayaa.
   c) Qalabkii ay keensato shirkad ku hawlan qodista khayraadka dhulka hoostiisa, waxaa laga dhaafayaa cashuurta iibka, haddii cashuurka dhaafka uu ogol yahay sharcigani. Waxay bixinaysaa cashuurta iibka haddii shirkadaasi iibiso qalabkii cashuur dhaafka loogu sameeyey si ay ugu fuliso hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa.

Qodobka 28aad: Dhammaan Heshiisyada Qodista Khayraadka Dhulka Hoostiisa Looma Ogola Laba-Jeer Faa'iid

1) Qodobkaan wuxuu dhigayaa in heshiiska qodisa khayraadka dhulka hoostiisa aan lagu wada heli karayn;
   a) In la ilaaliyo qoondadii faa'iido wadaag iyo dheelli-tirnaanta dakhliga ka dhalaneysey ee dhaqan galka aheyd wakhtigii heshiiska la saxiixay; iyo
   b) Faa'iidooyinka ka dhasha bedelaadaha lagu sameeyo xeerka dakhliga.
2) Marka loo eego qodobka 24, haddii heshiiskaasi uu beddelo wixii ku qornaa sharciga dakhliga ee khuseeyey heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa, waxaa lagu sii dhaqmi doonaa sharcigaas la bedelay, ilaa; -
   a) Dhamaadka heshiiska ama qodobadiisa; ama
   b) Qofka oo ka tanaasulay aaggii la siiyey, tanaasulkaas oo ogolaansho ka haysta wasiirka masuulka ka ah arrimaha Batroolka ama macdanta.
3) Marka la xisaabinayo cashuuraad sanadeedka dakhliga ee ku waajibay qof, iyadoo la tixraacayo faqradda 2aad ee kor ku qoran, Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhliga waxa u banaan;
   a) Inay sii waddo meel marinta xeerarka horay u jiray ee ah sharciga dakhliga, kaasoo Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhligu u aragto in uu ku haboon yahay ama ay tahay in la fuliyo sida ku xusan faqradda 2aad; iyo
   b) Iney Ku dhaqmi waydo wax kastoo cusub ama isbedel lagu sameeyey sharciga dakhliga cashuuraha haddii ay u aragto;
      i. Inay la xiriirto xeerarka ku cad faqradda (a); ama
      ii. Inaysan la xiriirin sharcigii hore ee dakhliga cashuuraha.
4) "Sharcigii hore ee dakhliga cashuuraha"

a) Waxaa loola jeeda sharciga dakhliga cashuuraha ee dhaqan galka ahaa wakhtiga la gelayey heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa sida ku cad faqradda 2aad; iyo
b) Marka eey munaasib tahay waa sharci dakhliyeed xitaa haddii la beddeley.

CUTUBKA 5AAD: MAAMULKA IYO MAARAYNTA

Qodobka 29aad: Xisaabaadka, Qiimaynta iyo Bixinta Cashuuraha

1) Iyadoo la tix gelinayo hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, mulkiilaha xuquuqda qodista khayraadka dhulka hoostiisa waa in:
   a) Uu joogteeya buugta xisaabaadka oo waafaqsan Sharciga Caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
   b) lacagta uu ku dejinayo xisaabaadka lahaanshaha, dakhliga, iyo cashuurta macaashka ay noqoto lacagta Doolarka Maraykanka ama lacagtii kale ee lagu soosaaro xeer nidaamiye.
2) Kala doorashada hoos imanaysa faqradda 1aad (b) ee kor ku xusan waa inay ahaataa;
   a) qoraal loona gudbiyey Wasaaradda Maaliyadda oo masuul ka ah dakhligu wakhtiga lagu dhaqmayo heshiiska lahaanshaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa
   b) dhaqan gal muddada uu heshiisku dhaqan galka yahey.
3) Haddii shirkaddu doorto lacag qalaad iney ku jaan gooyso xisaabaadka ama qiimaynta, Wasaaradda Maaliyadda oo masuul ka ah dakhliga waxay u oglaan karaan shirkada iney ku bixiso xuquuqihii dakhliga ama cashuurta macaashka lacagtaas ay dooratay. Ogolaanshaha Wasaaradda Maaliyadda waxa ay ku imaan kartaa haddii ay u aragto iney sidani tahay sida ugu haboon.
4) Qodobkaani ma xadidayo Qodobka 32 ee Sharciga maamulka Dakhliga (Tr.13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019).
5) Wasaaradda Maaliyadda oo Mas'uul ka ah Maamulka dakhliga cashuuruhu waxay xaq u leedahay inuu Hanti-dhowr gudaha (Internal Audit) ku sameeyaan shirkadda fulinaysa qodista khayraadka dhulka hoostiisa hawlaheeda maaliyadeed tobanka sano ee ku xiga sanadka ay soo gudbisay xisaabteeda.

Qodobka 30aad: Cashuur Celinta Iyo Bixinta Xuquuqda Lahaanshaha Khayraadka

1) Xuquuqaha dakhliga dawladda ee laga helayo Batroolka ama macdankta waa in lagu bixiyaa bil-waliba 25 maalmood gudahood kadib bishii la soo saaray Batroolka iyo/ama macdankta.
2) Markastoo la bixinayo xuquuqda lahaanshaha kheyraadka waa inuu la socda warqadaha cadaynaya bixinta oo la geeyo Wasaaradda Maaliyadda oo Mas'uul ka ah Maamulka dakhliga.
3) Waa in bixinta xuquuqda lahaanshaha iyo cashuurta loogu gudbiyaa hay'adda masuulka ka ah dakhliga hab waafaqsan sharciga. Habkaas oo ay ku cadyihiin qodobadaan soo socda:
   a) Cadadka Batroolka ama macdanaha ee ay ku waajibtay xuquuqda cashuurtu;
   b) Qiimaha suuqa ee uu Batroolku ama macdantu ka joogto oo lagu xisaabiyey sida waafaqsan faqradda 2 ee jadwalka koowaad ama faqradda 2 ee jadwalka labaad, sida hadba kiiska ay tahay in la waafajiyo;
   c) Xaddiga xuquuqda lahaanshaha kheyraadka ee ay tahay inuu qofka bixiyo; iyo
   d) wax kastoo warbixin ah oo ay u bahan tahay hay'adda masuulka ka ah dakhliga
4) Marka la soo gudbiyo galka lagu bixinayo xuquuqda lahaanshaha kheyraadka iyo cashuurta macaashka ee la siinayo dawladda waxaa Wasaaradda Maaliyadda oo Mas'uul ka ah Maamulka dakhliga samaynaysaa qiimeyn sida waafaqsan sharciga Maamulka Dakhliga (Shar Lr. 13 ee soo baxay 27 Octoobar 2019).

Qodobka 31aad: Qiyaasta, Cashuur Celinta Iyo Bixinta Cashuurta Macaashka Shirkadaha

1) Sharciga cashuurta macaashka ee tirsigiisu yahay 5 soona baxay 5 Noofeembar 1966 iyo Sharciga maamulka dakhliga cashuuraha ee tirsigiisu yahay 13 ee soo baxay 27 Otoobar 2019 iyadoo lala akhrinayo sharcigan, wuxuu dabaqayaa qiimaynta iyo bixina cashuurta macaashka ee laga rabo dadka fulinaya hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, khaas ahaan cashuurta macaashka waxaa loo bixin karaa in shirkaddu hormariso, ama ay u bixiso qaybqayb, ama sanadkiiba mar eey bixiso.
2) Qofka fulinaya hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa si loo qiimeeyo cashuurta sanadlaha ee ku waajibtay waa inuu soo gudbiyaa:
   a) Qiyaasta sanadka wixii cashuur ku waajibay ee uu u bixin rabo qayb qaybta sida ku cad faqradda 8 ee Jadwalka saddexaad ee sharciga; iyo
   b) Qiyaasta sanadka wixii cashuur ku waajibtay ee uu hal mar bixin rabo, sida ku cad sharciga cashuurta macaashka ee tirsiigu yahay 5 soona baxay 5 Noofeembar 1966.
3) Cashuur celinta iyo qiyaasta cashuurta ku waajibtey waa in uu cidda ku soo gudbiyay labadaba; hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa iyo hawlaha aan qaybta ka ahayn qodista khayraadka.
4) Cashuur celinta iyo qiimaynta lagu soo qeexay faqradda 2aad, waa in-
   a) Loo gudbiyaa Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhliga.
   b) Ku jiraan qaybaha kala duwan ee loo kala qoondeeyey hawlaha Batroolka, hawlaha macdanta iyo hawlaha aan ahayn qodista khayraadka dhulka hoostiisa.
   c) Kala cadaynta qiyaasta qaybaha hawlaha macdanta iyo hawlaha Batroolka waa in ay:
      i. Cadaysaa dakhli cashuureedka sanadlaha ah ee kaga waajibay qofka shaqooyinka batroolka ama macdanta iyo habka loo xisaabiyey.
      ii. Cadaysaa celceliska xaquuqda lahaanshaha iyo cashuurta macaashka kaga waajibtay dakhligaas ee hawlaha batroolka iyo macdanka.
      iii. Cadaysaa in cashuur kasta oo uu bixiyey qofku sanadka, ha ku bixiyee hormarin, qayb qayb ama sanadkiiba mar.
      iv. Cadaysaa cadadka cashuurta uu bixinayo waa cashuurta ku waajibtay sanadka sida ku cad faqradda ii) oo laga gooyey intuu horay u bixiyey sida ku cad faqradda iii).
      v. Cadaysaa cadadka cashuurta uu buxinayo wakhtiga uu gudbiyay qiimaynta ama cashuur celinta; iyo
      vi. Cadaysaa wax kastoo warbixin ah oo ay u baahan tahay Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhliga;
   d) Qaybta dakhliga ka imanaya hawlaha aan ahayn qodista khayraadka dhulka hoostiisa waa in lagu qiyaasaa ama lagu cadeeyaa iyadoo la tix gelinayo qoraalka ku cad faqradda 8 ee Jadwalka Saddexaad ee sharcigan ama qodobka 28 ee sharciga cashuurta macaashka ee tirsigiisu yahay 5 soona baxay Noofeembar 5 1966, kolba sidii ku haboon.
5) Marka la gudbinayo qiyaasta ama cashuur celinta Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhliga waxay u arkaysaa qiyaas, waxayna dib u samaynaysaa qiimayn waafaqsan Sharciga Maamulka dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.

Qodobka 32aad: Xiriirka Uu Sharcigani La Leeyahay Sharciga Maamulka Dakhliga

Sharcigan waxaa loogu dhaqmayaa iyadoo lala akhrinayo lana waafajinayo qodobada 3, 4 iyo 15aad ee Sharciga Maamulka dakhliga Tr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.

Qodobka 33aad: Wada Shaqaynta Hay'addaha Dawladda

1) Marka la dhaqan gelinayo sharcigaan, Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga waa in ay ula shaqayso si dhow dhamaan hay'addaha dowladda. ujeedada arrintaan laga leeyahay waa Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'addo sharciyeedka kale waxay wadaagi karaan xog kasta oo muhiim u ah hawlahooda shaqo, waxayna wada qaban karaan baaris wadajir ah. Tani ma xanibayso waajibaadk Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga inay hesho xogaha iyo baarista ay doonayso inay ku fuliso hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, si ay u fuliso waajibaadkeeda maamul ee dakhliga
2) Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga wuxuu tix gelinayaa go'aamada hay'adaha maamula qodista khayraadka dhulka hoostiisa ee khuseeya:
    a) Cadaymaha qofka ku hawlan hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa;
    b) Cadadka Batroolka iyo macdahana ee uu soo saaray qofka fulinayaa hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa;
    c) Kala xadaynta dakhliga kasoo xerooday hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, dakhligaasoo la cadaynayo aagga hawlaha batroolka ama hawlaha macdanka laga fulinayo, hadba sida kiisku yahay;
    d) Kala xadaynta kharashka ku baxay hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, kharashkaasoo loo ka la cadaynayo aaggaga hawlaha batroolka ama hawlaha macdanka laga fulinayo, hadba sida arinka yahay; iyo
    e) Haddii qofku jebiyey heshiiskii dayactirka deegaanka ee uu ogolaaday wasiirka masuulka ka ah hawlaha batroolka ama macdanta;
3) Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga iyo Hay'addaha sharci ee ay wada shaqeeyaan waa inay ilaaliyaan sirta xogta lala wadaagay sida ku cad Qodobka 20 ee Sharciga Maamulka Dakhliga Tr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.
4) Qodobkaan waxaa lagu dabaqayaa iyadoo la kaashanayo Qodobka 19 ee Sharciga Maamulka Dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 Otoobar 2019.

Qodobka 34aad: Saadaasha Maaliyadeed

1) Qofka haysta xuquuqda qodista khayraadka dhulka hoostisaa waa in uu:
    a) Diyaariyaa saadaalin muddada uu haysto xuquuqda lahaanshaha qodista khayraadka, saadaalinta waxaa qeexaysa;
        i. Cadadka, ilaha, habraaca iyo shuruudaha maalgashi ee ku baxay xuquuqda uu haysto ee hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa;
        ii. Kharashaadka ku baxaya sahaminta, qodista, horumarinta iyo kharashka raasamaalka ee la galay bilowga wax soo saarka;
        iii. Cadadka soo baxaya iyo sida loo iibgeynayo, gaar ahaan qiimaha lagu iibinayo;
        iv. Heshiisyada wax soo saarka iyo faa'iido wadaagga oo ay ku jiraan qaybinta la rajaynayo, siyaasadda eey ku qotonta qaybinta iyo siday u kala muhimsan yihiin dadka wax loo qeybinaayo iyo lacag labixinayo, khaas ahaan markay noqoto dulsaarka iyo bixinta daymaha;
        v. Cashuuraha iyo dakhliyada kale ee la siin karo Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo habka ay tahay in cadadkaas loo bixinayo loona xisaabiyo; iyo
        vi. Wixii kale ee war bixin ah ee Wasiirka masuulka ka ah dakhliga uu waajibiyo;
    b) Waa inay isticmaalaan shaxda ay dejisay Wasaaradda masuulka ka ah dakhliga si loo sameeyo saadaalin lagu tix raacay faqradda a); iyo
    c) Waa inay shaqaalaysiiyaan iyagoo ogaysiinaya Wasiira maaaliyadda, sarkaal;
        i. Leh khibrad dheeraad oo uu ku fulin karo warbixinaha lagu tix raacay faqradda (a);

ii. Xiriirin kara Wasaaradda masuulka ka ah dakhliga iyadoo la tix raacayo arrimaha ku cad qodobkan.

2) Saadaasha hoos imanaysa faqradda 1aad (a) waa in la diyaariyaa laba goor sanadkii, iyadoo lagu cadaynayo taariikhda, loona gudbiyo Wasiira masuulka ka ah dakhliga, wakhtia loo gudbinayana waa taariikhaha waafaqsan sharciga.
3) Marka la hello sadaasha lagu qeexay faqradda 2aad ee kor ku xusan, Wasiirka masuulka ka ah dakhliga wuxuu kaga dalban karaa qoraal qofka haysta xuquuqda qodis inuu soo gudbiyo faahfaahin dheeri ah oo ku saabsa saadaasha. Qofka xuquqda haystaa waa inuu ku keenaa 7 maalmood gudahood marka uu helo dalabka Wasiirka.
4) Haddii Mulkiilaha qodista khayraadka uu ogaado xogo markii hore ka qarsoonaa oo la xiriira qodobka (1)(a) waxa ku waajib ah inuu sida ugu dhakhsaha badan xogtaas dheeriga ah Wasiirka ka masuulka ah dakhliga ula wadaago.
5) Milkiilaha shirkadda qodista khayraadka dhula hoostiisa ee ku guul daraysta inuu xogtaas dheeriga ah la wadaago Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga waxaa lagu ganaaxayaa markastoo uu jebiyo dalabkaas qadar lacageed oo u dhexeeya $10,000 (Tobon kun oo doolarka Mareykan ah) ilaa $50,000 (Kontan kun oo doolarka Maraykanka ah).
6) Xogahaas hoos imanaya Qodobkaan waxaa Wasaaradda masuulka ka ah dakhliga u isticmaalaysaa saadaalinta dakhliga iyo maaraynta maaliyadda dawladda. Haddii kale xogahaas waxaa loola dhaqmayaa shuruudaha ku qoran Qodobka 20 ee Sharciga Maamulka dakhliga ee Tr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.
7) Marka la dhaqan gelinaayo qodobkan, Wasaaradda masuulka ka ah dakhligu waa in ay la shaqaysaa hay'addaha dowladda, sida, hay'adda maamulka batroolka iyo Wasaraadda Batroolka

CUTUBKA 6AAD: Burin iyo Dhaqangal

Qodobka 35aad: Burin

Sharcigan wuxuu burinayaa dhammaan qodobbada, farqadaha iyo xarfaha ka hor imaanaya sharciyadda hoos ku xusan:

1. Sharciga Dakhliga Cashuurta Lr. 5 ee soo baxay Nofeember 5, 1966.
2. Xeerka Macdanta Lr. 7 ee soo baxay Janaayo 9, 1984.
3. Sharciga Batroolka Lr. 19 ee soo baxay Febraayo 8, 2020.

Qodobka 36aad: Dhaqangalka Sharcigan

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa markuu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, isla markaana lagu soo saaro faafinta rasmiga ee Jumhuuriyadda.

JADWALKA 1AAD: BATROOLKA

Qaybta I: Xuquuqda Lahaansha Khayraadka

Boqoleyda lagu xisaabinayo Xuquuqda lahaanshaha khayraadka ee Qodobka 4aad waa 5% Batroolka la soo saarey. Waxana lagu qiimeynayaa sida hoos ku xusan.

1) Batroolka laga soo saaro Soomaaliya waxa lagu iibini karaa kaliya Doolarka Mareykanka xisaabtiisa sanadkiina waxaa loo soo gudbinayaa si saddexdii biloodba mar ah. Marka la iibiyo qiimihiisa waxa loo jaangoynayaa sida;

   Qiimaha Batroolka la iibshey waa qiimaha eey ku heshiiyaan shirkadda iibineysa iyo shirkada iibsaneysa waxase u shardiya in labadaas shirkadood in aysan ka dhaxeyn xiriir isu-daneysi ah (Tusaale ahaan in labada shirkadood midkood midda kale 50% iyo in ka badan sahmiyadeeda ay leedahey)

   Hadiise labadaas shirkadood uu ka dhexeeyo xiriir isu-daneysi ah waxaa la tixraacayaa Qodobbada ku cad iibka eexda ee ku qeexa jadwalka saddexaad ee hoos ku qoran.

2) Marka la xisaabinayo dakhliga lahaanshaha dawladda ee gaaska dabiiciga ah ee la soo saaray waxaa loo qiimanayaa sidan:
   a) Qiimaha lagu gaday gaaska soo baxay oo laga gooyey kharashkii lagu dhoofinayey ee la galay goobtii laga soo qaadayey, ama
   b) Haddii qiimaynta faqrad hoosaadka a) ay ka yar tahay qiimaha suuqa lagu kala iibsanayo waxaa la raacayaa xeerarka cadaynta qiimaha laba shirkadood oo is ahi wax u kala iibsadaan, wax kala iibsigaas oo aan waafaqsanayn qiimaha suuqa.
3) Haddii gaaska dabiciiga ah lagu iibiyey heshiis iibeed mudadiisu ka badan tahay hal sano qiimayntiisa waxaa go'aaminaya hay'adda dakhliga oo kaashanaysa wasiirka masuulka ka ah arrimaha batroolka, heshiis iibeedka waxaa lagu soo saaraya xeer gaar ah, sida ku cad Qodobka 13 ee Sharciga Maaraynta Dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 October 2019). Qiimayntaasi waa in ay waafaqsanaato faqrad hoosaadka 2)(b).

QAYBTA II: CASHUURTA MACAASHKA

Boqoleyda lagu bixinayo cashuurta macaashka hawlaha Batroolka waa 30%.

1) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha waa qoondada la ogolaaday in laga gooyo raasimaalkii lagu gatay xuquuqda Batroolka, taasoo buuxisay shuruudihii kharashaadka raasamaalka ee qiimaynta sanadka. Waxaa soo hoos gelaya wixii intaa la gatay dib loo soo gatay sida uu ku xusan Qodobka 12aad ee Sharcigan.
2) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha ee qiimaynta sanadlaha ahi waa xaddiga loo jaangooyey sanadkaas ee lagu qeexay Faqradda 3aad ee Qodobkan.
3) Cadad kastoo lagu qeexay Faqradda 1aad waxaa loo jaangoynayaa haddii uu qayb ka yahay Qjimayn sanadlaha cadadkaas la kharash gareeyey iyo sanadaha ku xiga inta ay ka dhamaanayso mudada xuquuqda qandaraaska.
4) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha, qoondadaas waa in la isticmaalaa sanad cashuureedka ay qusayso, lamana isticmaali karo wixii sanadkaas ka danbeeya.
5) Haddii la iska iibiyo xuquuq Batrool, sanad cashuureedkaas dhexdiisa qiimaha Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha wuxuu noqonayaa qiimaha u dhigma qiimaha xuquuqda Batroolka.
6) Haddii xuquuqda Batroolka hawlahooda ay ka socdaan wax ka baxsan aagag kala duwan Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha waxaa loo kala qaybinayaa aagagaas.
7) Wasaaradda mas'uulka ka ah arrimaha Dakhliga oo kaashanaya Wasaaradda mas'uulka ka ah

Batroolka waxay soo saarayaan Xeer Hoosaadyo qeexaya sida aagagaas ku xusan Faqradda 6aad. Qoondada dhiirigelinta maalgashigasanadlaha, qaybtuna waxay noqon doontaa sidaan:

a. Waxay ku salaysnaanaysaa aag kasta oo batrool qiimaha uu suuqa ka joogo,
b. Waxaa ka mid ah boqoleydii lagu cadeeyey markii la meel marinayey qorshaha qodista iyo horumarinta aagga qandaraaska.

Arrintaas waxaa u shardi ah, marka loo qaybiyo boqoleyda qaybta kaga soo hagaagaysa aaggaas qodista iyo horumarinta laga wado lama bedelayo, haddii dib laga ogolaado aag kale oo qodis iyo horumarin lagu samaynayo boqoleydii waxaa loogu kala qaybinayaa iyadoo la tixraacayo sidii ku cadayd qandaraaska aagga la qodayo.

JADWALKA 2AAD: MACDANTA

Qaybta I: Xuquuqda lahaanshaha macdanta

Xisaabinta boqolayda Xuquuqda lahaanshaha macdanta

1) Xisaabinta boqoleyda Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxaa lagu cadeeyey Qodobka 14aad ee Sharcigan, waana marka laga hadlayo Macdanaha lagu soo saaray qandaraaska macdan qodis:
   a. Dhagaxanta qaaliga ee aan ahayn kuwa aadka u qaaliga waxaa laga qaadayaa 6.5%;
   b. Dhagaxaanta aadka qaaliga u ah 8%;
   c. Wixii intaasa an ahayn waxaa laga qaadayaa 3%.
   d. Macdanta lagu soo saaray heshiis macdaneed oo aan ahayn kuwa kor ku xusan waxaa laga qaadayaa 3%.
2) Faqraddan waxay qeexaysaa:
   "Biraha qaaliga ah" waa Dahabka, Silver, Platinum, Iridium iyo wixii kale ee ay ku jiraan biraha, haddii ay yihiin wax cadadkoodu iib geli karo.
   "Dhagaxaanta qaaliga ah" waxaa loola jeedaa Amber, Amethyst, Beryl, Cat's eye, Chrysotile, dhaymanta, emerald, garnet, opal, ruby, sapphire, turquoise iyo dhammaan wixii la hal maala.
   "Dhagaxaanta aadka qaaliga u ah" waxaa loola jeedaa dhagaxaanta qiimahoodu ka sareeyo USD $500,000 Dollar Wiqiyadiiba (Per Ounce) oo u dhiganta ah 28 gram.

Sida Loo Qiimeynayo Macdanta

1) Iyadoo la tixgelinayo faqraddaan, marka la xisaabinayo lahaanshaha dakhliga dawladda ee macdanta waxa lagu qiimaynayaa.
   a. Qiimaha macdantaas lagu iibiyey oo laga gooyey kharashkii ku baxay suuq geynta, ama
   b. Haddii qiimahaas lagu iibiyey ee lagu qeexay qiimaha ku cadd Faqradda 1(a) uu ka yar yahay qiimaha suuqa ee wax lagu kala iibsado si eexasho ah, waxaa lagu dhaqmayaa si waafaqsan qiimaha suuqa.
2) Marka la xisaabinayo Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha, dhagaxa aadka qaaliga u ah qiimayntooda waxaa;
   a. Lagu jaan goynayaa qiimaha faqradeedka dhagaxa aadka u qaaliga ah ee aan weli la diyaarin.
   b. Waxaa lagu jaan goynayaa qiimaha ugu sareeya ee lagu kala iibsado dhagaxaan qaaliga ah, heshiiskasoo ay galeen;
      i. Cidda haysata xuquuqda qodista macdanta, iyo
      ii. Qiimaynta dawladda ama haddii uusan heshiis jirin iyo
      iii. Qiimeeye madax banana oo dawladda magacowday; iyo
   c. Kadib marka laga gooyo 3% qiimihii ugu sareeyey si loo daboolo kharashkii iib geynta ee la galay kadib soo saaristii

3) Marka la xisaabinayo Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha biraha aadka u qaaliga ah waxaa lagu qiimanayaa sidaan soo socota:
   a. Dahabka, qiimaha celcelis ahaan uu dahabku todobaadkaas ka joogo London oo Doolar maraykanka ah;
   b. Wixii dahab ka soo hara, celcelis ahaan qiimaha ee lagu kala iibsado biraha qaliga ah ee laga soo saaray Soomaaliya todobaadkaas dhexdiisa.
   c. Labadaas kiis ee ku xusan (a) iyo (b) kay tahayba waxaa laga goynayaa 3% si loo daboolo kharashkii suuq geynta.
4) Qiimaha celcelis ahaan lagu caddeeyey Faqradda 3aad xarafka (b) waxaa go'aaminaya Wasaaradda masuulka ka ah arrimaha Macdanta, wuxuuna ku salaysan yahay qiimaha maalin kasta oo todobaadkaas ka mid ah ee lagu kala iibsado macdantaas.
5) Haddii macdanaha lagu iibiyey heshiis iibeed mudadiisu ka badan tahay hal sano, qiimayntiisa waxaa go'aaminaya Wasaaradda masuulka ka ah dakhliga oo kaashanaysa Wasaaradda masuulka ka ah arrimaha macdanta, heshiis iibeedka waxaa lagu soo saarayaa xeer gaar ah, sida ku cad Qodobka 131 ee Sharciga Maaraynta Dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 October 2019). Waxaa laga rajaynayaa hab qiimayntaas in ay waafaqsanaato faqrad hoosaadka (1)(b).

Qaybta II: Cashuurta Macaashka

1) Boqoleyda Cashuurta Macaashka: Qiimaynta cashuurta dakhliga ee hawlaha macdanta waa 30%.

2) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha ee xuquuqaha macdanta

a)Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha waa qoondada la ogolaaday in laga gooyo raasamaalkii lagu gatay xuquuqda macdanta, taasoo buuxisay shuruudhii kharashaadka raasamaalka ee qiimaynta sanadka. Waxaa soo hoos gelaya wixii intaa la gatay dib loo soo gatay sida uu qeexayo Qodobka 22aad.

b) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha ee qiimaynta sanadlaha ahi waa xaddiga loo jaangooyey sanadkaas ee lagu qeexay faqrad hoosaadka (3).

c)Cadad kastoo lagu qeexay Faqradda 1aad waxaa loo jaangoynayaa haddii uu qayb ka yahay. Qiimayn sanadlaha cadadkaas la kharash gareeyey iyo sanadaha ku xiga inta ay ka dhamaanayso mudada xuquuqda qandaraaska.

d) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha, qoondadaas waa in la isticmaalaa sanad cashuureedka ay qusayso, lamana isticmaali karo wixii sanadkaas ka danbeeya.

e)Iyadoo la tix raacayo qodobka 22, Haddii la iska iibiyo xuquuq macdanta, sanad cashuureedkaas dhexdiisa qiimaha Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha wuxuu noqonayaa qiimaha u dhigma qiimaha xuquuqda macdanta.

JADWALKA 3AAD: SHARCIYADA CASHUURAHA MACAASHKA

Dadka xiriirku ka dhexeeyo

1) Labada daraf oo xiriir ka dhaxaynayo ee sharcigani ka hadlayo waa;
   a) Cid ayaa cid kale qaraabo la ah;
   b) Cidbaa cid kale kula ah shuraako ganacsi;
   c) Cidda iyo shirkad ay cadaynayso Faqradda 2aad ee soo socda; ama
   d) Haddii uusan soo hoos gelayn Faqraddaha a, b, iyo c ee kor ku xusan, waxaa xiriir laga malaysan karo in uu u danaynayo; -
      (i) Cid kale; ama
      (ii) Loo qaadanayo inuu xiriir la leeyahay.
2) Xiriirka ka dhexeeya Cid iyo shirkad waa midka buuxinaya shuruudahaan soo socda;

a) Cidda leh saami le'eg ama ka badan 50% xuquuqda dakhliga, raasumaalka ama awoodda codeed ee shirkadda, ha ahaado;
   i) Keli ama koox
   ii) Si toos ah ama si dadban
b) Qofkaasi waa qof xiriir leh sida ku cad Xarafka (a) ee farqadan.

3) Laba daraf kuma sifoobayaan xiriirka lagu qeexay Faqradd(1)(a)(b) **haddii Wasaaradda** Maaliyadda oo mas'uulka ka ah **dakhliga ku** qanacdo in uu qofi qofka kale dantiisa ka shaqaynayn.
4) "Qaraabo" waxaa loola jeedaa dadka uu ka dhexeeyo xiriir dhalasho, guur ama korsasho oo gaarsiisan jiilka saddexaad.

Kharashaadka aan laga goyn karin dakhliga la cashuurayo

1) Kuwaan soo socda lagama jarayo dakhliga cashuurta:
   a) Kharashka qoys ama si gaar ah qofku u isticmaalay.
   b) Kharashaadka ku baxa arrimo musuqmaasuq.
   c) Macaashka, ganaxyada lacageed ee dawladdu u soo rogtay marka sharci la jebiyo.
   d) Kharashaad ku baxay waxaan la cashuurayn.
   e) Raasamaal ka faa'iidaystay Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha.
   f) Khasaare ama qiime dhac kasta oo ku yimaadda raasamaalka.
   g) Lacagahay shirkaduhu bixiyeen markay ku guulaysteen qandaraaska (signing bonus)

Beeca eexda

1) Haddii isfaham uu ka dhexeeya dad is leh, mid waliba cashuurta dakhli ee ku waajibtay waa inuu u xisaabiyo si waafaqsan kala iibsiga ama mucaamalo dhex marta sida dadka aan waxba ka dhaxayn.
2) Mucaamalada dhex marta dadka aan xiriirku ka dhaxayn waxay qiimaysaa cadadka, sifooyinka, una qaybisaa kharashaadka laga goynayo dakhliga si dad kala madax banana.
3) Waxaa la soo rogayaa sharciyo qeexaya faqraddan, waxaana la tix raaci talooyinka caalamiga ah ee arrintaan quseeya.
4) Haddii Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga u aragto qof ama sharikadi aysan u hogaansanayn faqrad hoosaadka (1) ee kor ku xusan, waxay bedeli cashuur xisaabeedka ay soo gudbisay shirkadaasi, marka ay hawsha ku guda jirtana waxay:
   a) Dib u qiimanaysaa waxyaalihii ka dhashay wada shaqaynta dadka xiriirka leh oo ay ku jiraan wax kala amaahashada;
   b) Waxay dib u qiimaynaysaa dakhliga, khasaaraha iyo lacag bixinta iyo
   c) Kharashaadkii laga jaray dakhliga sidii loo qaybiyey.

Qiimaha ay ku fadhiso hantidu

1) Kharashka shirkadi hanti ku soo gadato wuxuu ka kooban yahay;
   a. Kharashaadkii lagu soo qaatay hantidaas oo ay ku jirto haddii kharashaadkii ku baxay dhismaha, warshadaynta iyo soo saarista hantidaas.
   b. Kharashaadkii shirkadda kaga baxay wax ka beddelka, dayactirka iyo rakibitaanka hantidaas
   c. Kharashaadkii shirkadda kaga baxay iibinta hantida, iyo
   d. kharashaad kasta oo la xariira helidda ama iibinta hantidaas.
2) Kharashaadka hantidaas waxaan ka mid ahayn kharashaadka lagu sheegay faqradda (a), (c), (d), (e) ama (f) ee qodobka (10) iyo (20) oo ah kharashka aan laga jarayn faqradda 2aad ee Jadwalka

ama kharashaadkii ku jiray hanti oo meel kale lagu xisaabiyey.

3) Faqradaan, kharashaadka fudud ee uu galay qofka soo iibsanaya ama iibinaya hanti waxaa ka mid ah;
   a) Kharashaadka xayeysiinta, cashuuraha la xiriira xawilaadda iyo kharashaadka ku baxa lacag wareejinta;
   b) Kharashaadka ku baxa qareennada ku difaacaya maxkamadaha lahaanshaha hantida, iyo
   c) Mushaaharaadka ay u qaataan khidmadahooda xisaabiyaha, wakiilka, xaraashlaha, dalaalka, la taliyaha, qareenka, sahamiyaha ama qiimeeyaha ee soo hoos gelaya kharashaadka ku xusan faqrad hoosaadyada (a) iyo (b) ee kor ku xusan.

Lacagaha Laga Helay Hantida La Iibiyey

1. Qofku qiimaha uu hantida ku iibshey waxaa weeye;
   a) Cadadkii uu ka helay wareejinta hantidaas oo ka kooban;
      i) Cadadkii uu ka helay wax ka bedelka uu ku sameeyey hantidaas
      ii) Cadadkii uu ka helay dayactirka hantidaas, iyo
      iii) Qiimo kastoo loogu balan qaado mustaqbalka

Iibinta Hantida

1) Qofkii ah mulkiilaha hanti wuxuu iibinayaa marka:
   a) Uu wareejiyo hantidaas, uuna ku wareejiyo qaab iibin, bedelasho, xawilaad, qaybis iwm.
   b) Markasta oo uu qofku lahaan waayo hanti horay uu u lahaa
   c) Markay soo hoos gasho duruufaha lagu sheegay Qodobka 12(3) iyo 22 (5)
2) Iibinta hantida waxaa ka mid ah haddii hantidaas badhkeed la iibsho.

Is waafajinta kharashaadka ku baxay lahaanshaha iyo lacagaha laga helay iibinta hantidaas

1) Haddii qof soo iibsado hanti mar keliya ama uu ku soo iibsado heshiis keliya wixii kharash soo iibsigaas ku baxay waa loo qaybinayaa.
2) Wixii faa'iido laga helo hantida la iska iibiyey waa loo kala qaybinayaa kharashka ku baxay iibkaas.
3) Haddii qof iibiyo qayb ka tirsan hanti kharashka hantidaas waxaa loo xisaabinayaa sidan hoos ku qoran;
   a. Waxaa loo kala qaybinayaa qaybta uu gaday iyo qaybta uu weli mulkiyadeeda haysto; iyo
   b. Si waafaqsan qiimaha suuqa kadib markuu gado

Ku Bixinta Cashuurta Si Saddex Biloodle Ah

1) Qofka ku guda jira hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa waxaa ku waajib ah inuu bixiyo cashuuraha dakhliga saddexdii biloodba mar, uuna cashuurtaas ka bixiyo dakhliga ka soo gala qodista khayraadka dhulka hoostiisa iyo dakhliyada kaleba.
2) Lacag bixintaas saddex biloodlaha ahi waxay waajib tahay dhamaadka saddexdii biloodba mar ee sanad cashuureedka.
3) Sida ku cad faqraddaha qaybta (4) iyo (5), cadadkasta ee sanad cashuureed waxaa loo xisaabinayaa sidaan soo socota; (A-C)/B

Macnaynta:

- **A** waa qiyaasta la soo gudbiyey ee ku waajibtay shirkadda inay bixiso cashuur sanadeed
- **B** waa cadadka qaybaha harsan ee sanadka; iyo

- **C** qaybaha cashuureed ee uu ilaa hadda bixiyey.

4) Cidda ku waajibtay inuu cashuurta u bixiyo si qayb qayb ah, waa inuu faylkiisa cashuurta u soo gudbiyaa, faylkaas oo ay ku caddahay qiimaha guud ee ku waajibay inuu bixiyo sanadka, isagoo tix raacaya qaab farsameedka ay waajibisay Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga oo ay ku cadahay wakhtiga la bixinayo cashuur qaybeedka ugu horeeya.
5) Shirkadi waxay wax ka beddeli kartaa qiyaastii lagu sheegay faqrad hoosaadka (4) ee kor ku xusan sanad cashuureedka gudihiisa keliya haddii aynan ogolaan Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga sida ku cad qodobka (50) ee sharciga maamulka dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.
6) Ujeedka faqraddaani waa in Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga u ogolaan karto in ay shirkadi markay cashuur bixinayso ku qiimayso cashuurtii ay sanadkii hore bixisay oo lagu daray qiime dheeriya oo munaasib ah.

Deganaanshaha Shirkadaha Sida Lagu Aqoonsanayo

Shirkadi Soomaaliya ayey degan tahay sanad cashuureed haddii:

a. Lagu abuuray Soomaaliya; ama
b. Sanad cashuureedkaas gudihiisa maamulka shirkaddu ay degan yihiin Soomaaliya

SHARCI LR.011

Taariikh: 20 Maarso 2023

OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0239/B11/23**, ku taariikheysan **14/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Dhowista Maalgashiga iyo Maalgashatada.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-030-23
TAARIIKH: 26/3/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA

HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA

CUTUBKA 1AAD
QODOBBO HORUDHAC AH

Qodobka 1aad
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa loogu yeerayaa Sharciga Dhawrista Xuquuqda Maalgashiga iyo Maalgashatada.

Qodobka 2aad
Mabda'a Guud

Mabda'a Guud ee Sharcigan waa Ilaalinta maalgashiga iyo maalgashatada si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda dalka

Qodobka 3aad
Erey bixin

Inta lagu guda jiro Sharcigan, haddii aan si kale loo dhigin:

1. "**Dastuur**" waxaa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. "**Khilaaf**" Waxaa loola jeedaa isfaham u-dhaxeeya dowladda iyo maalgashade ama maalgashatada dhaxdooda kaa soo lagu xalin doono shuruucda dalka si waafaqsan qodobka 16aad ee Sharcigan;
3. "**Maalgashi** toos ah" waxaa loola jeedaa maalgashi, ha ahaado mid keli ah ama kuwo la isu geeyay, mid cusub, mid hore u jiray, kaa oo u saamaxaya maalgashade ama koox maalgashata ah inay sameeyaan,helaan ama ku yeeshaan saami ganacsi faaiido doon ah;
4. "**Shirkad**" waxaa loola jeeda unug kasto oo ku hawlan dano ganacsi oo rasmi ah kana diiwan gashanJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
5. "**Jamhuuriyadda Federaalka**" Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
6. "**Maalgashade shisheeye**" waxaa loola jeedaa shirkad ama qof shisheeye ah taasoo Hanti-maalgashi ku sameeyay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa sidoo kale soo galaya qof Soomaali ah oo Maalgashigisa ku diiwan gashaday/gashatay dhalasho shishiiye;
7. "**Tabasho**" waxaa loola jeeda dhibaato uu ka cabanayo maalgashade/maalgashato;
8. "**Xarunta Caalamiga ah ee Xallinta Khilaafaadka Maalgashi**"- waa Hay'ad caalami ah oo madax bannaan taas oo ku hawlan xalinta khilaafaadka caalamiga ee maalgashi;
9. "**Maalgashade**" waxaa loola jeedaa maalgashade dalka u dhashay ama shisheeye ah;
10. **"Faa'iido joogta ah oo lagu leeyahay**" waxaa loola jeeda lahaanshiyaha ugu yaraan boqolkii**ba** 10 awoodda codaynta shirkad ganacsi ama wax la mid ah oo lagu yeesho ganacsi aan shirkad ahaan u abaabulnayn.
11. "**Maalgashade dalka u dhashay**" waxaa loola jeeda Muwaadin soomaaliyeed oo maalgashaday Dalka;
12. "**Talaabo/Go'aan Dowladeed**" waxaa loola jeeda talaabooyin ama Go'aano Dowladda soo saartay oo saameynaya maalgashade ama maalgashagiisa;
13. **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo HorumarintaDhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

14. **"Wasaarad"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

15. **"Damaanadda Maalgashi ee Dhinacyada-badan"** damaanadda caymis ee ay bixiso Hay'adda Damaanadda Maalgashi ee Dhinacyada-Badan. (Multilateral Guarentee Agency-MIGA);

16. "**Tilmaan**" waxaa loola jeedaa talo lagu bixiyay hanaan xeer-nidaamineed;

17. **"Dib u la noqosho"** waxaa loola jeedaa maalgashade hantidiisa kala baxaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

18. "**Xeer-nidaamiye**" waxaa loola jeedaa xeerar ka dhasha sharcigan;

    "Xukuumadda" – waxaa loola jeedaa Dowladda Federaalka Soomaaliya;

19. **"Sharcigan"** waxaa loola jeedaa Sharciga Dhawrista Maalgashiga iyo Maalgashatada, 2023.

20. "**Sharcigan**" waxaa loola jeedaa Sharciga Dhawrista Maalgashiga iyo Maalgashatada, 2023. Sharciganwaxaa loo fasirayaa, loona dhaqan-galinayaa si waafaqsan:

    (b) Dastuurka iyo shuruucda maalgashiga ee dalka;

    (t) Axdiyada iyo heshiisyada maalgashiga ee caalamiga ah ee xubinta ay ka tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

"**Qarameyn dadban**" waxaa loola jeeda talaabo kasto oo ay qaado dowladdu taasoo si aan toos aheyn ugu yeelato saameyn hantida maalgashade;

Qodobka 4aad

Ujeedada Sharciga

1) Sharcigaan wuxuu Ilaalinaya xuquuqda maalgashatada iyo maalgashigooda si waafaqsan **qodobka 26aad ee Dastuurka** iyo shuruucda dalka isla markaana wuxuu dhiirigalinaya in dalkeena la maalgashado, iyadoo loo marayo qaab isu dheelli tiraya danaha guud ee xuquuqda iyo waajibaadka maalgashatada.
2) wuxuu Sugaya xaqqa madaxbanaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u leedahay inay u nidaamiso maalgashatada si waafaqsan danta guud.
3) Hubinta xuquuqda dastuuriga ah ee ku cad Dastuurka iyo shuruucda khuseeya maalgashatada iyo maalgashiyada Jamhuuriyadda Federaalka; iyo
4) Xoojinta shuruucda iyo xeerarka dhaqangalka ah ee khuseeya maalgashiyada iyo arrimaha xiriirka la leh.

Qodobka 5aad

Baaxadda Sharciga

Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa:-

(b) Dhammaan maalgashiga ka jira iyo kuwa laga abuuri doono dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee loo sameeyay si waafaqsan Shuruucda dalka.
(t) Dhammaan maalgashiga ka dhasha heshiisyada caalamiga ah ee dhinacyada badan iyo kuwa laba-geesoodka ah ee ay qayb ka tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
(j) sido kale sharcigaan wuxuu nidaaminayaa dhamaan heshiisyadda maalgashi ee gudaha JFS
(x) Xukuumada Federaalka Soomaliya waxa ay soo sareysa siyaasado lagu jaan gooynaya xadiga, baaxadda iyo qeybaha hortabinta u leh maaalgashiga shisheeye.

CUTUBKA 2AAD
HABKA LAGU DHAQAYO MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA

Qodobka 6aad
Nidaam maamul oo ku dhisan Cadaalad iyo Sinnaan

1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa ay dejineysa nidaam maamul oo ku dhisan caddaalad iyo sinnaan oo ay u siman yihiin maalgashatada dalka udhashay iyo kuwa shisheeyaha ah sida ay tilmaamayan shuruucda iyo xeerarka dalka.
2) Dawladda Soomaaliya waxay u samaynaysaa garsoor cadaalad ah oo ay u simanyihiin maalgashiga/maalgashatada dalka, si waafaqsan shuruucda dalka dhaqan galka ka ah.
3) Dawladda waxay dejineysaa habraacyo ay ku hubinayso go'aan qaadasho sababeysan ee maamul iyo garsoor kuna salaysan cadaalad iyo sinnaan, iyadoo ay qayb ka yihiin maalgashadayaasha dalka u dhashay iyo kuwa shisheeyaha ah.
4) Maalgashatada shisheeye iyo kuwa wadaniga ah waxey xaq u leeyihiin in ay si siman u helan xogaha maalgashi iyo fursadaha ganacsi ay dowladdu hayso.
5) Hadii khilaaf yimaado, maalgashatada iyo wixii la-xiriira maalgashiyadooda, waxay xaq u yeelanayaan in loo maro go'aan-ka-gaaristooda hab-dhaqan ku dhisan shuruucda dalka, dhagaysi daahfuran, cadaalad ku salaysan, oo maxkamad ka dhaca, ama, xaaladaha ay ku haboonaato, maxkamad gaar ah ama wadiiqo kale oo madax bannaan oo aan dhinacna u jan-jeerin.
6) Sababaynta iyo go'aannada maamul ee ku xusan faqradda (3) ee kore waxaa lagu bixinayaa qaab qoraal ah.
7) Dawladda waxay u sugaysaa amniga maalgashatada shisheeye iyo hantidooda si waafaqsan shuruucda maalgashiga ee wadanka iyo xeerarka caalamiga ah, iyadoo la tix-galinayo awoodda dhaqaale iyo mida tayo ee suurtagalka ah.

CUTUBKA 3AAD
YAGLEELIDDA IYO ILAALINTA MAALGASHIYADA

Qodobka 7aad
Yagleelka Maalgashiga (Establishment of Investments)

1) Dhammaan maalgashiga waxaa loo yagleelayaa si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dhaqan-galka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2) Maalgashiga aan waafaqsanayn faqrada 1aad ee qodobkan, dalka kuma yeelanayo xuquuqda maalgashiga shiisheeye.
3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lagama yagleeli karo maalgashi kasta oo kahor imaanaya Diinta, dhaqanka/hiddaha ama saameyn taban ku yeelanaya deeganka iyo cimillada.
4) Maalgashatada shisheeye waa inay u hogaansamaan xeerarka shaqaaleysiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed, mana shaqaaleysiin karaan shaqaale ajnabi ah oo aan ku imaan baahi aqooneed ama

mid xirfadeed.

Qodobka 8aad

Kala-sooc la'aanta Maalgashatada (Most Favoured Nation (MFN) Treatment).

1) Iyadoo loo hogaansamayo Dastuurka iyo shuruucda maalgashiga dalka iyo xeerarka caalamiga ah, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sinnaba looma takoori karo maalgashatada shisheeye.
2) Faqrada 1aad ee Qodobkan ma khusayso heshiisyada ay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay la gasho, dawlado iyo ururro calami ah, sida midow canshuur, heshiis canshuur dhaaf dhaqaale, ama mid lacageed, suuq furan, ama aagagga-dhaqaale ee xorta ah.

Qodobka 9aad

Hab-dhaqan Siman (National Treatment)

1) Maalgashatada shisheeye iyo maalgashigooda waxaa loola dhaqmayaa si la mid ah maalgashatada Soomaaliyeed.
2) Mar kasta waxaa la tix galinayaa:
   (b) xajmiga uu leeyahay maalgashiga.
   (t) qaybta dhaqaale ee uu maalgashigu ku wajahan yahay.
   (j) saameynta togan ama taban ee uu maalgashiga ku leeyahay bulshada, deegaanka, shaqooyinka si toos ah iyo si dadban.
3) Qiimayntuna waa inaysan ku koobnaan keliya xaaladaha ku xusan Faqradda (2) ee qodobkan.

Qodobka 10aad

Dammaanad qaadka maalgashi

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay dammaanad qaadaysa bad-qabka iyo amniga maalgashatada shisheeye iyo maalgashigooda si waafaqsan Dastuurka iyo shuurucda kale ee dalka.

Qodobka 11aad

Dhowrista Sharci ee xuquuqda Maalgashiga. (Legal Protection of Investment)

Maalagashatada shisheeye waxa ay xaq u leedahay in ay ku yeelato hanti (guurto ama ma guurto ah) gudaha dalka si waafaqsan qodobka **43aad** ee Dastuurka iyo shuruucda dhaqangalka ah ee Jamhuuriyadda FederaalkaSoomaaliya.

Qodobka 12aad

Soo gelinta iyo La Bixidda Lacagaha iyo Maalgashiga

(Funds Transfer and Repatriation of Investments)

1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa suuq furan oo xor ah, Maalgashatada shisheeyana waxa ay dalka soo galin karaan, Lana bixi karaan hanti maalgashi si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalka.
2) Hantida la soo galinayo ama laga saarayo dalka waxay noqon kartaa:

(b) Midda dalka la so galinayo:

i. Mid lagu yagleelayo maalgashi cusub.
ii. Mid Lagu horumarinayo ama lagu ballaarinayo maalgashi jiray.

(t) Midda dalka laga saarayo:

i. Faa'iidada maalgashiga,

ii. Dakhli hanti la iibiyay, lil tirka **(liquidation)** dhammaan ama qayb maalgashi,
iii. Bixin kharashyada ama daymaha heshiisyada dibadda,
iv. Mushaaraadka iyo xuquuqaha kale ee ajaanibtu ku yeeshaan maalgashiga,
v. Lacagaha lagu mutaysto magdhaw la xiriira qaramaynta maalgashiga, si waafaqsan Qodobka 13 ee Sharcigan
vi. Lacagaha loo qaato magdhaw lagu bixiyay khasaaro uu la kulmay maalgashade.
vii. Lacagaha lagu kala qaato xallinta khilaafaadka, si waafaqsan Qodobka 16 ee Sharcigan
viii. Lacagaha lagu bixiyo daymo heshiis ku salaysan taas oo lagu leeyahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lacagahaas, loona shubayo maalgashade shisheeye
ix. Lacagaha kale ee ku tilmaaman sharciyo gaar ah ama xeer-nidaamiyeyaal dhaqangal ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay qaadan kartaa talaabooyin ay ku xadidayso ama hakineyso dirista ama la bixista lacagaha sida:
(b) Hadii ay jirto Xaalad dhaqaale iyo midda maaliyadeed oo khasbeysa xaddidaad noocaas ah;

4) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo tix-raaceyso arrimaha ku xusan faqrada 3 (b), waxay u maraysaa qaab aan kala-sooc lahayn, oo saamaxaya in laga baaqsado dhibaato aan loo baahnayn oo ku iman karta danaha maaliyadeed iyo kuwa dhaqaale ee maalgashatada iyo maalgashigooda.

CUTUBKA 4AAD
QARAMAYNTA
Qodobka 13aad
Qaramayn (Expropriation)

1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lama wareegayso mana qaramaynayso hanti maalgashade shisheeye, kumana qasbayso maalgashadaha inuu hantidiisa maalgashi uga tanaasulo, si toos ah ama si dadban. Hadii looga maarmi waayo hantida maalgshadaha isticmaalka dan guud (Public Purpose, oo ay cadeeyen ha'adaha ku shaqada leh si aan kala sooc-laheyn (Non-discreminatory Manner) waala qarameyn karaa iyada oo la bixinayo magdhaw sugan oo ah qiimaha hantida lagala wareegay.
2) Magdhawgaas waa inuu u qalmaa qiimaha suuqa waqtiga la qarameeyay (taariikhda qaramaynta), ama isla waqtiga wargalinta, haddii ay qiimaha hantida saamayn silloon ku yeelatay wargalinta qaramaynta la dul-dhigay. Tilmaamaha lagu qiimaynayo waxaa ka mid ah, qiimaha hantida haddii ay sii shaqaynayso, qiimaynta guud ee hantida oo ay ku jirto qiimaynta rasmiga ah ee canshuurta hantida la taaban karo, iyo tilmaamihii kale ee haboon, si loo xaqiijiyo sicirka suuqa ee macquulka ah, kadib qiimeynta qiimo-dhaca ku yimaada qalabka maalgashi ee la qiimeynayo. Magdhawgu waa in lagu bixiya muddo aan ka badneyn 120 maalmood.
3) Maalgashatada hantidooda la qarameeyay waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka-doodan habraaca qiimeynta qarameynta, si waafaqsan Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, taas oo dib loogu eegayo kiiskiisa iyo qiimaynta maalgashiga si waafaqsan Mabaadi'da ku xusan cutubkan.
4) Hadii ay dhacdo cabasho ku aaddan qarameyn dadban, maalgashaduhu waxa uu xaq uleeyahay in uu cabashadaas u gudbiyo xafiisyadda qaran ee xalinta Khilafaadka ee la xiriira maalgashiga ama hay'adaha garsoorka dalka.
5) Hadii ay dhacdo cabasho ku aaddan qarameyn dadban, maalgashaduhu waxa uu xaq uleeyahay in uu cabashadaas u gudbiyo xafiisyadda qaran ee xalinta Khilafaadka ee la xiriira maalgashiga

ama hay'adaha garsoorka dalka.

Qodobka 14aad

Awoodda soo-saarista xeernidaamiye (Sovereign Right to Regulate).

Wasiirka Wasaaradda, isaga oo latashanaya hay'adaha ay kala dhaxeyso hawlaha maalgashiga ee dowladda, waxauu soo saarayaa xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan gelinayo qodobbada sharcigan.

CUTUBKA 5AAD
MAARAYNTA CABASHADA IYO XALLINTA KHILAAFAADKA

Qodobka 15aad

Maaraynta Cabashooyinka

(Grievances Management)

1) Wasiirka waxa uu magacaabi karaa Guddiyo farsamo oo maareeya cabashooyinka la xiriira dhinacyada maalgashiga kahor inta aysan gaarin heer garsoor.
2) Hadii ay cabasho timaado, Maalgashaduhu wuxuu cabashada u soo gudbinaya Guddiyada ku xusan qodobkan farqadiisa 1aad.
3) Guddiyada ku xusan qodobkan farqadiisa 1aad wuxu qiimaynayaa arrintan, waxuuna ku dhaqaaqayaa talaabo kasta oo ay u arkaan inay macquul tahay si loo gaaro xal sharciga waafaqsan oo ay ku qancaan dhammaan dhinacyada.
4) Guddiyadu waa in ay cabashada si rasmi ah loogu soo gudbiyay go'aan uga gaaraan muddo 30 maalmo shaqo gudahood. Hadii dhinacyada midkood ku qanci waayo wuxuu cabashadiisa u gudbisan karaa hay'addaha garsoorka sida ku cad Qodobka 16aad ee sharcigan.
5) Guddigu waa inuu xafidaa xogta, macluumaadka iyo qoraallada ay maalgashatada u soo gudbiyaan.
6) Xeer-nidaamiye gaar ah ayuu Wasiirku ku soo saaraya habraacyadda loo marayo maareynta cabashooyinka la xiriira maalgashiga.

Qodobka 16aad

Xallinta Khilaafaadka

1) khilaafaadka maalgashi ama khilaafaadka la xiriira fasiraadda sharcigan ee ka dhax-dhasha dhinacyada maalgashiga waxaa si deg deg ah oo hufan loogu xalinayaa wadatashi iyo wadahadal dhax-mara dhinacyada si waafaqsan qodobka 15[aad].
2) Haddii xal togan laga gaari waayo, dhinacyada maalgashiga waxay xaq u yeelanayaan inay cabashadooda u gudbiyaan hay'adaha garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3) Dhinacyadu hadii ay ku qanci waayaan go'aannada garsoorka dalka, waxa ay u gudbin karaan khilaafkooda xarumaha caalamiga ah ee xalinta khilafaadka Maalgashiga oo ay Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya xubin ka tahay sida;
    I. The International Center for Settlement of Investment Disputes (ICSID) (Convention Arbitration);
    II. The Additional Facility of ICSID (if Convention Arbitration is not available)
    III. The Arbitration Rules of the United Nations Commissions for International Trade Law (UNCITRAL Rules);
4) Go'aannada ka soo baxo xarumaha ee qodobkan faqradiisa 3[aad] ku xusan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay dhaqangelisaa.

CUTUBKA 6AAD
QODOBO ISKU DHAFAN

Qodobka 17aad
Xeer-Nidaamiyeyaasha
(Regulations)

Wasiirku waxa uu soo saaraya xeer nidaamiye lagu hirgelinayo sharcigan si loo gaaro u-jeedooyinkiisa.

Qodobka 18aad
Iska-Hor-imaadka Sharciyada

Haddii ay dhacdo in ay iska hor yimaadan qodobada sharcigan iyo qodobo sharci kale oo la xidhiidha maalgashiga, qodobada sharcigan ayaa mudnaanta yeelanaya.

Qodobka 19aad
Qodobbada Kala-guurka

1) Maalgashiyada jira ee ku salaysan Heshiisyo Maalgashi oo Laba-geesood ah ama ka badan ka hor dhaqangalka Sharcigan waa la dhawrayaa ilaa iyo muddada ay ku egyihiin, si waafaqsan shuruudaha heshiisyadaas.
2) Maalgashi kasta oo la sameeyo dhaqan galka sharcigan kadib waxaa lagu dhaqayaa sharcigan.
3) Si waafaqsan shuruucda dalka iyo xeerarka caalamiga ah, Dowladaha xubnaha ka ah DFS ma gali karaan heshiis maalgashi oo aysan qeyb ka aheyn DFS.

Qodobka 20aad
Dhaqangalka Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka BJFS, saxiixana Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

SHARCI LR.012 **Taariikh: 20 Maarso 2023**

OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0233/B11/23**, ku taariikheysan **14/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-041-23
TAARIIKH: 20-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
21 FEB 2023
SOO GELIID/RECEIVED

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

CUTUBKA KOOWAAD:
UJEEDDADA, AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED

Qodobka 1aad:
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda (HSJ) Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad:
Eray-Bixin

1) Hay'ad: Waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda (HSJ) Soomaaliyeed.
2) Wasaarad: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS.
3) Wasiir: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).
4) Agaasimaha Guud: Waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.
5) Sarkaal: Waxaa loola jeedaa hawl-wadeen ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda oo waajibkiisu yahay fulinta waajibaadka sharci ee Hay'adda.
6) Bar-xadduudeed: Waxaa loola jeedaa bar ay dowladda Soomaaliya u asteysay in laga soo galo ama looga baxo dhulka Jamhuuriyadda Federalka Soomaliya (Dhul, cir iyo Bad)
7) Uqaybsanaha (attachee): Waxaa loola jeedaa Sarkaalka hay'adda ee wakiilka uga ah safaaraddaha iyo qunsuliyadaha.

Qodobka 3aad:
Ujeeddooyinka Sharciga

1) Sharcigan, waxaa lagu dhisay Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed ee u xilsaaran maamulidda iyo maareynta socdaalka si waafaqsan Dastuurka JFS iyo Sharciyada kale ee Dalka. Hay'addan waxay leedahay Sharciyad Qaanuuni ah.
2) Waxaa kaloo Sharcigan lagu caddeeyey awoodaha iyo xilalka Hay'adda, si waafaqsan sharcigan. 3).Hay'addu marka ay gudaneyso xilkeeda waxay u madax-bannaan tahay howlaheeda waxayna u hoggaasameysaa Dastuurka JFS iyo Sharcigan.

Qodobk 4aad:
Baaxadda Sharciga

Sharcigan, waxaa lagu maamulayaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo ah Hay'ad leh awood sharci fulineed, mid maamul iyo siyaasadeed ee arrimaha socdaalka iyo qeybta hay'adda ka khuseysa jinsiyadda, si waafaqasan Sharciyada dalka.

Qodobka 5aad:
Shakhsiyadda Qaanuuneed ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda

1) Hay'addu, waxay leedahay shakhsiyad qaanuuneed oo ay wax ku dacweyn karto, laguna dacweyn karo, sidoo kalana ay ku gali karto heshiisyo leh awood qaanuuneed oo lagu fududeynayo hawlaha lagama maarmaanka u ah hay'adda, si waafaqsan sharcigan iyo sharciyada kale ee dalka.
2) Hay'addu waxay yeelaneysaa Astaan iyo shaabbad u gaar ah.

Qodobka 6aad:
Astaanta Hay'adda

Astaanta Hay'addu, waa gorgor duulaya oo ay ku wareegsan yihiin labo caleemood oo kor ku leh xidig, hoosna uga dhagan gaashaan ku midabeysan calanka JFS, uuna ku qoran yahay magaca hay'adda oo dhammeystiran, sida ku cad lifaaqa 1aad ee sharcigan.

Qodobka 7aad:
Xarunta Hay'adda

Xarunta dhexe ee Hay'adda waa Magaalo Madaxda JFS ee Muqdisho, waxayna laamo ku leedahay Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo xafiisyo ka hawlgala Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud dibedda ee JFS.

Qodobka 8aad:
Xilalka iyo Waajibaadka Hay'adda

1) Horumrinta iyo fududeynta dhammaan adeegyada la xiriira socdaalka iyo inta ka khuseyso jinsiyadda;
2) Bixinta noocyada dukumentiyada safarka ee dalku leeyahay sida, dal-ku-galka, dal-ku joogga iyo degenaashiyaha;
3) Kontoroolka iyo sugidda irridaha dalka laga soo galo, loogana baxo;
4) Diiwaan-galinta ugu horeysa ee qaxootiga iyo dadka magan-galyo doonka ah, marka ay yimaadaan dalka iyo siinta dal-ku-joog ku meel gaar ah, iyadoo lala wadaagayo xogta hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha iyo hay'addaha u xil-saaran amniga dalka;
5) Hubinta, baarista iyo xaqiijinta dukumentiyada socdaalka ee dadka soo-gelaya ama ka baxaya dhammaan bara- xadduudeedyada dalka;
6) Hubinta iyo kaydinta xogta muwaadiniinta iyo ajaanibta;
7) Ka-qeyb qaadashada maareynta qaxootiga iyo dadka magangalyo-doonka ah, iyadoo la waafajinayo Dastuurka, Sharciga Qaxootiga dalka iyo shuruucda Caalamiga ah oo ay Soomaaliya qeybta ka tahay;
8) Musaafurinta iyo hakinta safarrada dadka, iyadoo fulineysa awaamiir maxkamadeed iyo go'aamadda siyaasadeed ee xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo danta guud ee qaranka

9) Caddeynta & Xaqiijinta codsiga jinsiyad siinta Ajnabiga la soomaaliyeynayo iyo Hubinta in uu buuxiyay shuruudaha jinsiyad siinta.
10) Ka-hortagga dhammaan dembiyada la xiriira socdaalka iyo jinsiyadda;
11) La-dagaallanka dhoofinta aadanaha ee loo maro sifooyin aan sharciga waafaqsaneyn.
12) Fulinta shuruucda iyo heshiisyada caalamiga ah ee la xariira socdaalka ee ay Soomaaliya qeybta ka tahay.

Qodobka 9aad:
Awoodaha Hay'adda

Awoodaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed waa sidan:

1) In ay Hay'adaha Garsoorka u gudbiso qof kasta oo eedeysane ama dembiile ah oo ay maxkamad ama Boliiska Caalamiga ah ay u soo gudbiyaan, amase qof la qabtay isagoo fal-dembiyeed gacanta kula jira.
2) Heysashada iyo isticmaalka hub u gaar ah oo ah nooca fudud oo uu sharcigu u oggol-yahay, lana diiwaangaliyey oo lagu ilaalinayo nafta hawl-wadeennada Hay'adda iyo gudashada waajibaadkooda shaqo;
3) In ay ka hawlgasho gudaha dalka, xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Soomaaliya ay ku leedahey dalalka dibadda, iyadoo si mideysan ugu shaqeynaysa Sharcigan.
4) Bixinta, cusbooneysiinta iyo la noqoshada noocyada kala duwan ee baasaboorrada JFS si waafaqsan Sharci gaar ah oo soo saaro Baarlamaanka JFS.
5) Bixinta, Diidmada, Laalista iyo kala noqoshada noocyada kala duwan ee oggalaashiyaha dal ku galka (Visa-ha) JFS.
6) Bixinta iyo baabi'inta oggalaashaha dalku joogga JFS
7) Bixinta iyo baabi'inta noocyada kala duwan ee oggolaashaha degenaaanshaha JFS.
8) Bixinta oggolaashaha guryo-noqodka "Go Home-ka" ee la siiyo muwaadiniinta ku sugan dalka dibaddiisa ee aan haysan baasaboor shaqeynayo Sida ku cad lifaaqa 2aad ee sharcigan .
9) Musaafurinta ajaanibta iyo hakinta safarka socdaaleyaasha xaaladaha uu jideynayo sharcigu.
10) Qabashada awoodaha kale ee shuruucda kale ee dalku siinayaan hay'adda.

Qodobka 10aad:
Sugidda Amniga Shaqada iyo Xarumaha Hay'adda

1) Taliyaha Boliiska Federaalka ayaa soo asteynaya Cutub gaar ah oo la shaqeynaya Hay'adda;
2) Cutubka gaarka ah ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee loo asteeyay Hay'adda, waxay ku shaqeynayaan awoodda, amarrada maamul iyo hawlgelinta Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.
3) Waxayna gudanayaan;
    a. Sugidda Amniga Xarumaha, hawl-wadeennada iyo madaxda Hay'adda;
    b. In ay Howlwadeenada Hay'adda kala howlgalaan Ilaalinta, gaar-ahaanka iyo

kontoroolka bar-xuduudeedyada dalka;

c. Fulinta go'aannada iyo amarada hay'adda ee la xariira; qabashada eedeysanayaasha iyo horgeynta Cadaaladda, iyagoo u maraya hab-raacyada sharci ee dalka.

Qodobka 11aad:
Howlgalka

Hay'addu waxay ka hawlgashaa dhammaan JFS, waxayna leedahay:

1) Saraakiil gudaneysa waajibaadkooda heer Federaal.
2) Hannaan maamuus iyo labbis u gaar ah oo ay ku xardhan yihiin astaanta Hay'adda.
3) Saraakiil u tababaran sugidda iyo gaafmeerka dhaqdhaqaaqa xuduudaha isla markaana haysta hubka fudud iyo gaadiid ku qalabeysan aaladaha socdaalka

Qodobka 12aad:
Ilaalinta Hufnaanta Shaqo ee Hay'adda

Hay'addu waxay leedahay hab-dhaqan hufan oo ku saleysan shaqo wanaag sida;

1) Ilaalinta mabaadi'da aasaasiga ah ee hufnaanta iyo shaqo wanaagga hay'adda
2) Dhowrista iyo u-hoggaansanaanta hab-raacayada sharcigan, sharciyada kale ee dalka iyo siyaasadaha gaarka ah ee Hay'addu leedahay.
3) Wada-shaqeynta iyo ilaalinta hannaanka kala sarreynta shaqo ee Hay'adda.

CUTUBKA LABAAD:
QAAB-DHISMEEDKA IYO HAB-MAAMULKA HAYA'ADDA

Qodobka 13aad:
Qaab-dhismeedka Hay'adda

Qaab-dhismeedka Hay'addu wuxuu ka kooban yahay laba qeybood oo kala ah Socdaalka iyo Jinsiyadda, wuxuuna maamul ahaan u dhisan yahay sida soo socota:

1) Hal Agaasime Guud;
2) Labo Agaasime Guud Ku-xigeen oo kala ah:
    a. Agaasime Ku-xigeenka Socdaalka; iyo
    b. Agaasime Ku-xigeenka Jinsiyadda.
3) Agaasime-Waaxeedyo,
4) Agaasime Laameedyo;
5) Madax xafiisyo;
6) Kormeereyaal;
7) Uqaybsanayaal(attachee)

Qodobka 14aad:
Shuruudaha Magacaabista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada

Qofka loo magacaabaayo Agaasimaha Guud ama Ku-xigeennada Hay'adda waa in uu buuxiyo shuruudaha soo socda:

1) In uu yahay Somali Muslim ah;
2) In ay da'diisu ka yareyn 30 (soddan) sano;
3) In uu dhimirkiisu dhan yahay;
4) In aan maxkamadi ayna ku xukumin xukun Maxkamadeed oo gaaraya shan sano.
5) In uu haysto shahaado Jaamacadeed ama in uu leeyahay khibrad la xariirta amniga ama arrimaha socdaalka oo aan ka yarayn 5 (shan) sano

Qodobka 15aad:
Magacaabista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada

1) Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda waxaa soo jeedinaya Wasiirka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada, kaddib waxaa Xeer Madaxweyne ku magacaabaya Madaxweynaha JFS si waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka.
2) Magacaabista Ku-xigeennada Agaasimaha Guud waxaa soojeedinaya Wasiirka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada.

Qodobka 16aad:
Xilka iyo Awoodaha Agaasimaha Guud

Agaasimaha Guud waa Madaxa iyo hoggaanka ugu sarreeya maamulka hay'adda, wuxuuna mas'uul ka yahay waajibaadka fulineed ee hawlaha hay'adda, si waafaqsan Sharcigan, Xeer Nidaamiyeyaasha hay'adda iyo shuruucda dalka, wuxuuna yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadyada hoos ku qoran:

1) Ilaalinta awoodaha iyo mas'uuliyadda qaab-dhismeedka Hay'adda ee ku cad Qodobkan iyo Qodobka 13aad ee Sharcigan;
2) Maaraynta, isku-duwidda iyo kormeerka hawlaha hay'adda iyo hawlwadeenadeeda si waafaqsan sharcigan iyo sharciyada kale ee JFS;
3) Isagoo la-tashanaya Wasiirka Wasaaradda, wuxuu diyaarinayaa istiraatiijiyado cad oo kor loogu qaadayo hawlaha hay'adda;
4) Xiriirka hawlaha adeegga ee kala dhaxeeya hay'adaha dawladda iyo kuwa caalamiga ah.
5) Saxiixa heshiisyada ay hay'addu kula galeyso heerkeeda Hay'adaha Caalamiga ah ama Hay'adaha dhigeeda ee Dalalka kale, kadib oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda;
6) Magacaabista iyo awoodsiinta Agaasime waaxeedyo, Madaxda laameeydo iyo u-qeybsaneyaal ka hawlgalaya Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud JFS;
7) Magacaabista iyo awoodsiinta Guddiyada hawl-fulineed ee hay'adda;
8) Meel-marinta ku dhaqanka qorshaha miisaaniyadda iyo diyaarinta Miisaaniyad sannadeedka Hay'adda isagoo la-tashanaya Wasiirka.
9) Isugu yeerista kulamada kala duwan ee maamulka Hay'adda, shir guddoomintooda iyo talo-siintooda.

Qodobka 17aad:
Xil ka-qaadista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada

Xil ka-qaadista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennadiisa waxaa loo marayaa isla habraacii loo maray magacaabistooda, sida Waafaqsan Qodobka 15aad ee Sharcigaan.

Qodobka 18aad:
Xilka iyo Waajibaadka Ku-xigeennada Agaasimaha Guud

Xilka iyo waajibaadka Ku-xigeenada Agaasimaha Guud waa sidan soo socota;

1) Qabashada shaqooyinka la xiriira Socdaalka iyo Jinsiyadda, iyadoo mid walba uu qeyb mas'uul ka yahay.
2) Qabashada hawlaha kale ee shaqo ee uu u idmo Agaasimaha Guud ee hay'adda;
3) Buuxinta kaalinta Agaasimaha Guud si ku-meel-gaar ah, marka uu ku maqan yahay fasax ama shaqo dibbedda ah ama ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad oo u saamixi karin gudashada xilkiisa, isagoo qoraal ku caddeynaya labada ku-xigeen midka kaalintiisa buuxinaya inta uu maqan yahay.
4) Haddii Agaasimaha Guud ay ku timaado geeri, ama xaalad caafimaad darro joogta ah oo dhaqtar soo caddeeyey taas oo aan u saamaxeynin gudashada waajibkiisa.
5) Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee Socdaalka ayaa noqonaya sii hayaha xilka Agaasimaha Guud inta laga macaabayo Agaasime Guud si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 19aad:
Waajibaadka U-qeybsaneyaasha Hay'adda Socdaalka

U-qeybsaneyaashu, waxay u xil-saaran yihiin

1) U-qeybsanaha Hay'adda wuxuu maamul ahaan hoos tagayaa Safiirka ama Qunsulka Guud;
2) U-qeybsanayaashu Waxay u xilsaaran yihiin bixinta dhammaan noocyada kala duwan ee documentiga socdaalka marka uu helo ogolaanshaha Safiirka ama Qunsulka safaaradda.
3) Wuxuu fulinayaa Shuruucda iyo Habraacyada ay Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.

CUTUBKA SADDEXAAD:
HAWL-WADEENADA HAY'ADDA IYO WAXYAABAHA KA REEBAN

Qodobka 20aad:
Hawl-wadeennada Hay'adda

1) Hawlwadeenada Hay'adda waxay noqonayaan saraakiil iskugu jira ciidan iyo rayid si isku dheelitiran rag iyo dumar una tababaran fulinta hawlaha hay'adda.
2) Hawl-wadeennada hay'addu waxay leeyihiin xuquuq iyo daryeel gaar ah oo aan lagu xad-gudbi karin, waana saraakiil Dowladeed waxaana lagu maamuli doonaa Xeer nidaamiye ugaar ah oo uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda.

Qodobka 21aad:
Shuruudaha Hawl-wadeennada Hay'adda

Qofka ka mid noqonaya hawl-wadeennada Hay'adda waa in uu yeeshaa shuruudahan soo socda:

1) In uu yahay muwaadin Soomaali oo Muslim ah;
2) In Da'diisu aysan ka yareyn siddeed iyo toban (18) sano;
3) In uu maskax ahaan u caafimaad qabo;
4) In aysan maxkamad ku xukumin fal-dambiyeed ciqaabeed; shantii (5) sano ee u danbeysay;
5) In uu soo dhamaystirtay muddadii tababarka iyo tijaabada ee ka mid noqoshada hawl-wadeennada rasmiga ah ee Hay'adda.
6) In uu haysto uga yaraan shahaado Dugsi Sare marka laga reebo shaqaalaha qabanaya shaqooyinka hoose.

Qodobka 22aad:
Xuquuqda Asaasiga ah ee Hawl-wadeenada Hay'adda

Howlwadeen kasta oo ka tirsan Hay'adda waxa uu leeyahay xuquuqda asaasiga ah ee hoos ku qoran iyo xuquuqdii kale ee sharcigaan, xeer-nidaamiyeyaasha, ama xeer-hoosaadyada Hay'addu siiyaan:

1) Mushaar bille ah oo ku jaango'an darajadiisa shaqo;
2) Gunnooyin uu ku muteysanayo hadba nooca, ahmiyadda, iyo xilka uu Hay'adda u hayo;
3) Sarkaalka Hay'adda, wuxuu leeyahay fasax sanadeed bil ah oo uu qaadanayo mushaarkiisa;
4) Daryeel caafimaad oo lagu qeexi doono hab-raac gaar ah;
5) Fasaxyada maalmaha ciidaha ama feestooyinka qaran ama baddal u dhigma;
6) Dallacsiin marka uu muteysto sida xeer-nidaamiyeyaasha Hay'addu tilmaamayaan;
7) In uu helo xuquuq kasta oo uu ku muteysto Sharcigaan, xeer-nidaamiyeyaasha, xeer-hoosaadyada iyo go'aamada maamul ee madaxda Hay'adda.
8) Howlwadeenada Hay'adda ee Rayidka ah waxay ku xuquuq yihiin shaqaalaha rayidka ah ee dowladda federaalka, halka howlwadeenadda ciidanka ahna ay ku xuquuq yihiin ciidamadda ay ka tirsanyihiin.

Qodobka 23aad:
Waxyaabaha ka Reebban Hawl-wadeenada Hay'adda

Dhammaan Hawl-wadeenada Hay'adda ee heer kasta waxaa ka reeban:

1) Kamid-noqoshada xisbiyada siyaasadeed;
2) Faafinta iyo la-wadaagista xogta shaqada Hay'adda dhinac kale oo aysan khuseyn;
3) Isticmaalka noocyada maandooriyaha.
4) Ka faa'iideysiga duruufaha muwaadiniinta iyo macaamiisha kale, iyadoo la isticmaalayo awoodda Hay'adda; iyo
5) Qabashada ama ka-mid-noqoshada shaqo kale oo ka hor-imaanaysa shaqada uu u hayo Hay'adda.

Qodobka 24aad:
Anshax-marinta Hawl-wadeenada Hay'adda

1) Hay'addu waxey yeelaneysaa Xeer-hoosaad Anshax iyo Guddiga Anshax-marin.
2) Hawl-wadeen kasta oo ka tirsan Hay'adda oo gala fal liddi ku ah waxna u dhimaya anshaxa iyo dhaqanka hay'adda waxaa loo cuskanayaa Sharciyada ciidanka iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.

Qodobka 25aad:
Waayidda Xubinnimada Hay'adda

Hawl-wadeenada Hay'adda, waxay xubinnimadooda ku waayi karaan Arrimaha Soo Socda:
1) Inuu ka ruqseysto shaqada;
2) In Maxkamad ay ku xukunto xukun Maxkamadeed oo gaaraya shan sano.
3) Xubinta oo aqbasho xil Kale
4) Xil gudasha la'aan si waafaqsan habraaca Xeer nidaamiyaha Hay'adda;
5) Geeri ku timaada;

CUTUBKA AFARAAD:
MIISAANIYADDA, HANTI-DHOWRKA IYO WARBIXIN SANADEEDKA HAY'ADDA

Qodobka 26aad:
Miisaaniyadda Hay'adda

1) Hay'addu, waxay yeelaneysaa miisaaniyad u gaar ah oo kamid ah miisaaniyadda guud ee Qaranka.
2) Hay'addu, waxay sanad kasta soo diyaarinaysaa miisaaniyad-sanadeed waxayna u gudbinaysaa Wasaaradda Maaliyadda.
3) Hay'addu, waxay u madaxbannaan tahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyay si waafaqsan shuruucda maamulka maaliyadda guud ee u degsan Dalka.

Qodobka 27aad:
Xisaabaadka iyo Hantidhowrka

Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka ayaa u xilsaaran in uu faafreeb iyo dabagal ku sameeyo misaaniyadda Hay'adda iyo sida loo isticmaalay.

Qodobka 28aad:
Warbixin Sanadeedka Hay'adda

Hay'addu, waxay sanad walba dhamaadkiisa bisha Diseembar, soo bandhigeysaa warbixin sanadeed ay ku caddeynayso wax-qabadkii sanadkii dhamaaday, iyadoo u gudbineysa Wasiirka Wasaaradda.

CUTUBKA SHANAAD:
QODOBO QUBANNE AH

Qodobka 29aad:
Xeer Nidaamiyeyaasha Hay'adda

Hay'addu waxay yeelanaysaa Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan-gelinayo sharcigan, waxaana soo saaraya Agaasimaha Guud ee Hay'adda oo u gudbinaya Wasiirka, waxaana lagu soo saarayaa Xeer Wasiir.

Qodobka 30aad:
Baabi'in

Sharcigani wuxuu baab'inayaa Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin oo la xiriira arrimaha socdaalka iyo qeybta hay'adda ka khuseysa jinsiyadda.

Qodobka 31aad:
Dhaqangal

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, saxiixana Madaxwaynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Lifaaqa 1aad:
Astaanta Hay'adda







Lifaaqa 2aad:
Warqadda Dal-ku-noqoshada "Go-home"

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

TEMPORARY TRAVEL DOCUMENT

وثيقة السفر المؤقتة

Tar/Date: ☐☐ ☐☐ ☐☐☐☐

Lambar/TD No: _____

PHOTO

Magaca / Full Name:	الإسم
Magaca Hooyo / Mothers Name:	اسم الأم
Jinsiga / Gender:	الجنس
Tariikhda Dhalashada / Date of birth: ☐☐ ☐☐ ☐☐☐☐	تاريخ الميلاد
Goobta Dhalashada/ Place of birth:	مكان الميلاد
Jinsiyadda/Nationality:	الجنسية
Calaamad Wajiga/ Face marks:	علامة مميزة
Cinwaanka dalka uu deganyahay/ Address in the country of residence:	عنوان بلد الإقامة
Tariikhda la bixiyay / Date of issue: ☐☐ ☐☐ ☐☐☐☐	تاريخ الإصدار
Hay'adda bixisay / Issuing Authority :	جهة الإصدار
Mudada ay ansax tahay / Valid until:	فترة الصلاحية

Warqaddaan waxaa lagu gali karaa oo kali ah xudnudaha dalka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya

This TTD for use only to travel back to the Federal Republic of Somalia

هذه الوثيقة للسفر المؤقتة صالحة للعودة الي جمهورية الصومال الفيدرالية فقط

Signature: _____ Date: ☐☐ ☐☐ ☐☐☐☐

Immigration and Naturalization Directorate, Maka Al Mukarama Road, Mogadishu, Somalia
Phone: +252 61 581 4055, Email: info@immigration.gov.so www.immigration.gov.so

XEER MADAXWEYNAHA LR.63
MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BOLIISKA SOOMAALIYA & XIL KA QAADIS TALIYIHII HORE EE CIIDANKA BOLIISKA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad Xarafka 'b' iyo Qodobka 87aad ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.2 ee soo baxay 23/12/1972, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Warqadda Sumaddeedu tahay **WAG/XWD/149/23** ku taariikheysan **25/01/2023**, ka soo baxday Xafiiska Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha ahna Ku-Simaha Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha, ujeedaduna tahay Talo Soo Jeedin.

MARKA UU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Summadiisu tahay **SHGW.00.19.01.23** ee ku taariikheysan **26/01/2023** iyo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S ee Summadiisu tahay **XRW/094/01/2023**, kuna taariikheysan **26/01/2023**, kuna saabsan Go'aan Gole-Ansixinta Magacaabidda Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in la magacaabo Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliya.

MARKUU TIXGALIYEY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay sarkaalka xillkan loo magacaabayo.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan waxaa **S/Guuto Sulub Axmed Firin** loo magacaabay in uu noqdo Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Waxaa **S/Guuto Cabdi Xasan Maxamed Xijaar** laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Muqdisho, Febraayo 02, 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-017-23
TAARIIKH: 26-02-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA (1)
OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 70

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA ee ARRIMAHA CAAFIMAADKA iyo BADQABKA BULSHADA SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay Marwada loo magacaabayo xilalkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye Sare Madaxweynaha J.F.S ee Arrimaha Caafimaadka iyo Badqabka Bulshada Soomaaliyeed.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay Hodan Cabdullaahi Cali in ay noqoto La-Taliye Sare Madaxweynaha ee Arrimaha Caafimaadka iyo Badqabka Bulshada Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Muqdisho, 03 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HANGUK-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE Lr.71
WAREEJIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 49 ee soo baxay 1970kii, kuna saabsan Dhismaha Asluubta Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGALIYEY: Baahida loo qabo in sarkaalkan loo wareejiyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay loo wareejiyey Ciidanka Booliska Soomaaliyeed isaga oo ka tirsanaa Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

Lr.	Darajo	Magaca
1.	L/X/le	**Aways Axmed Xaashi**

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: Janaayo 5,2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-016-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Madaxwaynaha J.F.S.
Mudane Dr Xasan Sheikh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 72

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA ee KA HORTAGGA IYO LA-DAGAALANKA FIKRADAHA XAGJIRKA ah ee RABSHADAHA WATA (PCVE)

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye Sare Madaxweynaha J.F.S ee Ka Hortagga iyo La-Dagaalanka Fikradaha Xagjirka ah ee Rabshadaha Wata (**PCVE**).

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay Cabdullaahi Maxamed Nuur in uu noqdo La-Taliye Sare Madaxweynaha ee Ka Hortagga iyo La-Dagaalanka Fikradaha Xagjirka ah ee Rabshadaha (**PCVE**).

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Muqdisho, 07 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HHV-015-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.73

MAGACAABIS MADAXA WADA-XAAJOODKA GANACSIGA EE URURKA GANACSIGA ADDUUNKA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qoddobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKUU TIXGALIYEY: Baahida loo qabo magacaabista Madaxa Wada-xaajoodka Ganacsiga ee Ururka Ganacsiga Adduunka.

Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu u magacaabay **Sadiq Abdikarim Haji Ibrahim** in uu noqdo Madaxa Wada-xaajoodka Ganacsiga ee Ururka Ganacsiga Adduunka.

Qoddobka 2aad

Xeerkan waxaa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doona faafinta rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho 10 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-019-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxwaynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 74
MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962 kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/0058/11/2022, ku taariikheysan 15/11/2022, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Axmed Maxamuud Xuseen Diirshe**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo waxaa leeyahay **Dr. Axmed Maxamuud Xuseen Diirshe** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Axmed Maxamuud Xuseen Diirshe** ka howl galayaa Gobolka Benaadir gaar ahaan magaalada Muqdishu.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 16 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-014-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 75

MAGACAABIS LA-TALIYE KU-XIGEENKA AMNIGA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir Amniga Qaranka oo aqoon fiican u leh arrimaha Amniga Qaranka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo waxaa **Mudane Kamaludin Dahir Hassan** loo magacaabay in uu noqdo La-Taliye Ku-Xigeenka Amniga Qaranka.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Muqdisho, 16 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-013-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.76
DALLACSIIN KORMEERE AQOON-YAHANAD AH

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY:	Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.
MARKUU TIXGELIYAY:	Soo jeedinta Taliyaha Boliiska Soomaaliyeed warqadda summadeedu tahay **Tir/XTCB/21/71/2022**, taariikh: **25/12/2022**, ujeedaduna tahay **Soo Jeedin Dallacaad Kormeere Aqoon-yahanad ah**.
MARKUU GARWAAQSADAY:	Mudnaanta ay mudan tahay in la dallacsiiyo aqoon - yahanaddan.

Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaaladda uu magaceedu hoos ku xusan yahay loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran iyada oo ka mid ah Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

No	Darajo	Magaca	U Dallacay
1	K/S 22665	Hodan Axmed Cali	L/X/le

Qodobka 2aad

Sarkaaladda magaceedu kor ku xusan yahay waxay xaq u yeelanaysaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggol yahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-058-23
TAARIIKH: 26-05-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAAGA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Muqdisho, Janaayo 23, 2022

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.77

MUSHAARKA IYO GUNNOOYINKA MAS'UULIYIINTA MAAMULKA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka **87aad**, Faqradda **1aad** iyo Faqradda **2aad** ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka **90aad** ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka **16aad** ee Xeer Madaxweyne **Lr. 130** ee soo baxay **22/04/2012**, kuna saabsan Sharciga Bankiiga Dhexe ee Soomaaliyeed iyo Hay'adaha Maaliyadda Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S ee warqadda sumadeedu tahay **XRW/0886/01/2023**, ku taariikheysan **07/01/2023**, ujeedaduna tahay **Soo Jeedin Sharciyeynta Mushaarka iyo Gunnooyinka Mas'uuliyiinta Maamulka Bankiga Dhexe ee Soomaaliya**.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ee Xukuumadda J.F.S warqadda sumadeedu tahay **MOF/OM/1337/2023**, ku taariikheysan **03/01/2023**, ujeedaduna tahay **Soo Jeedin Ku-aadan Sharciyeynta Gunnooyinka iyo Mushaaraadka Mas'uuliyiinta Bankiga Dhexe ee Soomaaliya**.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Guddoomiye Ku-Xigeenka Bakiga Dhexe warqadda sumadeedu tahay **Gov-10/1144/2022**, ku taariikheysan **21/12/2022**, ujeedaduna tahay **Soo Jeedin Wax-Ka-Badal Gunnooyinka Madaxda Sare Bankiga Dhexe ee Soomaaliya**.

MARKUU TIXGELIYAY: Muhiimadda ay leedahay sharciyeynta mushaar iyo gunno la aqbali karo in la siiyo Guddoomiyaha, Guddoomiye Ku-Xigeenka iyo Xubnaha Guddiga Maamulka ee Bankiga Dhexe (Non-Executive Board of Directors).

Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa mushaarka Guddoomiyaha Bankiga Dhexe iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka Bankiga Dhexe lagu saleeyay kan Agaasimayaasha Guud ee Hay'daha Dowladda.

Qodobka 2aad

Guddoomiyaha Bankiga Dhexe, Guddoomiye Ku-Xigeenka Bankiga Dhexe iyo Xubnaha Guddiga Maamulka ee Bankiga Dhexe (Non-Executive Board of Directors) waxa ay **Lix bil (6) kasta** sameeynayaan **Labo kalfadhi** oo kaliya taas oo ka dhigaysa wadarta guud ee kalfadhiyada **sanadkii Afar jeer (4) jeer oo kaliya**. Dhammaan kalfadhiyada waxaa lagu qabanayaa Dalka gudahiisa.

Qodobka 3aad

Xubnaha Guddiga Maamulka ee Bankiga Dhexe (**Non-Executive Board of Directors**) waxa **halkii kalfadhi** ay xaq u yeelanayaan **$ 1,000 oo kaliya**.

Qodobka 4aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho, Janaayo 28, 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN 059-23
TAARIIKH: 26/1/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA J.F.S
RIXID / SENT
28 JAN 2023
BY:
SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE. LR. 78
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha ' A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/031/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **22/01/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu **saxiixo** xeerkan, waxuu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **D/le D/Hoose 935 Qaasim Ducaale Cabdi** 33 jir ah **ina Khadiijo Axmed Xaaji** ku dhashay Baraawe , kana tirsan Ciidanka Ilaalada Deegaanka Xamar, kadib markii uu si bareer ah u dilay **Marxuum Abuukar Maxamed Sh. Nuuraani**, taariikhdu markay ahayd **10/01/2023** falkaas oo ka dhacay **Degmada X/Wayne**.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan-gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 28 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-037-23
TAARIIKHDA: 26-01-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
28 JAN 2023
BY:
SAACAD SAXEX

XEER MADAXWEYNE. LR. 79
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha ' A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/030/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **22/01/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxuu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **Xasan Juule Shaakir** 33 jir ah **ina Jamiilo Gaabow Maxamuud** ku dhashay Balcad, kana tirsan Ciidanka Ilaalada Degmada Balcad, kadib markii uu si bareer ah u dilay **Marxuum Cali Taliye Cariif**, taariikhdu markay ahayd **10/01/2023** falkaas oo ka dhacay **Degmada Balcad Gobolka Sh/Dhexe**.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan-gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 28 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-056-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SERT
21 JAN 2023
BY:
SAACAD SAXNX

XEER MADAXWEYNE. LR. 80
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha ' A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/112/2022** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **22/01/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxuu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **D/le Nisa Bukhaari Cawil Maxamuud Cabdi** 19 jir ah **Dahabo Xasan Cilmi** ku dhashay Luuq, kana tirsan Ciidanka **HSNQ**, kadib markii uu si bareer ah u dilay **Marxuum Ex. D/le Nisa C/raxmaan Axmed Dhalahow**, taariikhdu markay ahayd **28/03/2022** falkaas oo ka dhacay **Degmada Dolow ee Goboika Gedo** gaar ahaan **Xarunta Nisa ee Degmada Dolow**.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan-gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 28 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-055-23
TAARIIKH: 31-01-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 5 JAN 2023
BY: SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE. LR.81
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A' 'B' iyo "C" ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/050/2022** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **22/01/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **D/le Bol 448 C/risaaq Axmed Mukhtaar** 23 jir ah ina Aamino Cabdulaahi ku dhashay Awdheegle ka tirsan Saldhiga Booliska Degmadda Afgooye, ka dib markii uu si bareer ah u dilay **Marxuum Ex K/K Bol 6884 Mustaf Xuseen Xasan**, taariikhdu markay ahayd 29/09/2022 falkaas oo ka dhacay Degmada X/jajab.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 28 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-051-23
TAARIIKH: 26/01/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
RIXID / SENT
28 JAN 2023
BY:
SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE. LR. 82
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha ' A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.

MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/209/2022** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **22/01/2023**.

MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxuu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **L/A/le X. 18162 Cali Max'ud Xusen** 30 jir ah **Xaliimo Xuseen** ku dhashay Xamar, kana tirsan **Ururka 4aad Guutada 16aad** ee **Danab XDS**, kadib markii uu si bareer ah u dilay **Marxuum Ex. D/le X. 12217 Abshir Caraboow Cali**, taariikhdu markay ahayd **06/03/2022** dilkaas oo ka dhacay **Tuulada Caliyoow Barow ee Gobolka Sh/Hoose**.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan-gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 28 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-623-23
TAARIIKH: 26-05-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 3 JAN 2023
BY:
SAACAD ____ SAXIIX

XEER MADAXWEYNE. LR.83
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A' 'B' iyo "C" ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/271/2022** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **22/01/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **A/le Bol. 22405 Max'ed Nuur Sheekh Warre** 26 jir ah ina Faadumo Max'ed Ibraahim ku dhashay G/baay, ka tirsan Laanta Socotada Booliska, ka dib markii uu si bareer ah u dilay **Marxuum Ex D/le Bol. 23223 Axmed Cali Cabdi**, taariikhdu markay ahayd 17/03/2022 falkaas oo ka dhacay Degmada Hodon.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 28 Janaayo 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-052-23
TAARIIKH: 26-3-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.84
DALLACSIIN SARAAKIIL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka Ku-Meel Gaar ah J.F.S.

MARKUU ARKAY : Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliya.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo saraakiishan.

Waxaa uu Madaxweyhuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalkiisha magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran mid kasta, iyagaoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Tr.	L.Ciidanka	Magaca	U Dallacay
1.	X/46731	Cabdirisaaq Maxamuud Xaaji Muxumed	S/Guuto
2.	X/43020	Faysal Cabdulaahi Cali Aadan	G/Dhexe
3.	X/42873	Cabdulmanaan Cali Xuseen Xayle	G/Le
4.	X/43146	Ilyaas Cali Mukhtaar Maxamed	G/Le
5.	X/43665	Cabdifataax Cumar Axmad Maxamad	G/Le
6.	X/43270	Siyaad Bare Maxamad Guuleed Cali	G/Le
7.	X/41948	Maxamad Xuseen Aadan Ibraahim	L/X/Le
8.	X/43723	Cabdifataax Aadan Qalinle Cabdi	L/X/Le
9.	X/43281	Cusmaan Cabdi Yuusuf Amiir	L/X/Le
10.	X/41729	Maxamuud Cabdiqaadir Maxamuud Jaamac	L/X/Le
11.	X/41897	Fatxi Dayib Ibraahim Diiriye	L/X/Le
12.	X/42119	Baashe Cali Jaamacguuleed	L/X/Le

13.	X/42071	Maxamad Daahir Sahal Shuuriye	L/X/Le
14.	X/42074	Farxaan Cabdulaahi Maxamad Xuseen	L/X/Le
15.	X/41747	Xasan Gaabow Maxamad Cusmaan	L/X/Le
16.	X/41771	Cabdikhaaliq Maxamad Cabdi Jaamac	L/X/Le
17.	X/41665	Abubakar Xasan Cabdi Cilmi	L/X/Le
18.	X/43026	Fuaad Cabdullaahi Maxamuud Raage	L/X/Le
19.	X/42589	Cabdiwahaab Nuux Axmed Faarax	L/X/Le
20.	X/42307	Faysal Axmed Maxameed Cabdiraxmaan	L/X/Le
21.	X/42998	Cabdixakiin Cabdiraxmaan Cali Shirwac	L/X/Le
22.	X/43992	Maxamad Cabdi Faarax Bucul	L/X/Le
23.	X/43824	Ibraahim Cali Cabdulaahi Xaydar	L/X/Le
24.	X/43380	Maxamuud Xuseen Geeldoon Xirsi	L/X/Le
25.	X/44971	Maxamuud Saalax Mataan Afrax	L/X/Le
26.	X/46320	Muqtaar Yuusuf Cali Cosoble	L/X/Le
27.	X/46340	Axmed Shaafi Muxumed Mursal	L/X/Le
28.	X/44133	Cabdiraxmaan Axmed Maxamuud Gaareey	L/X/Le
29.	X/44649	Maxamed Siyaad Muxumed Dhunkaal	L/X/Le
30.	X/44387	Mustaf Nuur Suudi Axmed Jabriil	L/X/Le
31.	X/44751	Cilmi Aadan Isaaq Jaamac	L/X/Le
32.	X/45135	Qaalid Xasan Axmed Shirwac	L/X/Le
33.	X/45371	Xuseen Cabdiweli Yuusuf Ibrahim	L/X/Le
34.	X/44980	Cabdi Muxumed Nadiif Cumar	L/X/Le
35.	X/46003	Siid Cumar C/Llaahi Cali Raage Culusoow	L/X/Le
36.	X/44594	Maxamed Cali Cabdi C/Lle	L/X/Le
37.	X/41913	Samatar Ali Ahmad Hussein	X/Le
38.	X/41782	Abdirisak Muhammad Ismael Hassan	X/Le
39.	X/41797	Khalid Abokar Ibrahim Muse Mahamoud	X/Le
40.	X/42089	Ibrahim Muhammad Yarow Ahmad	X/Le
41.	X/43947	Cumar Cabdiqaadir Maxamad Aadan	X/Le
42.	X/41688	Hassan Nasir Somane Khairow	X/Le
43.	X/41920	Isa Mahamoud Muhammad Ahmad	X/Le
44.	X/41861	Muhammad Hussein Abdi Ibrahim	X/Le
45.	X/42867	Ibraahin Jaamac Maxamuud Maxamuud	X/Le
46.	X/46074	C/Laahi Calas Maxamuud Cabdi	X/Le
47.	X/43723	Cabdifataax Aadan Qalinle Cabdi	L/X/Le

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggol yahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho, Febraayo 6, 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-051-23
TAARIIKH: 10-02-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA (1) OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 85
MAGACAABIS HANTI-DHOWRAHA GUUD ee QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 2aad ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 1aad ee Sharci Lr. 34 ee soo baxay 14/04/1972.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Ku-Simaha Wasiirka ahna Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda.

MARKUU ARKAY: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee Sumaddiisu tahay **SHGW.00.22.02.23** ee **09/02/2023**, kuna saabsan ansixinta in **Qareen Axmed Ciise Guutaale** loo magacaabo **Hanti-Dhowraha Guud ee Qaranka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S warqadda summadeedu tahay **XRW/105/02/2023** ee soo baxday **09/02/2023**,kuna saabsan **Go'aan Gole-Ansixinta Magacaabidda Hanti-Dhowraha Guud ee Qaranka.**

MARKUU TIXGELIYAY: Waayo-aragnimada uu u leeyahay mudanaha xilkan loo magacaabayo.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu Madaxwaynaha J.F.S u magacaabay **Qareen Axmed Ciise Guutaale** in uu noqdo **Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka**.

Qodobka 2aad

Wixii Hawlo, Xuquuq iyo Maamuus ah waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Lr. 11 ee 05/12/2006 ee Shaqaalaha Rayidka.

Qodobka 3aad

Xeerkani waxa uu baabi'inayaa wixii xeer ah ee ka hor imanaya, kana horreeyay.

Qodobka 4aad

Waxa uu xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Muqdisho, Febraayo 16, 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-049-23
TAARIIKH: 26-02-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.86
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE ARRIMAHA DIBADDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qoddobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyahay marwada loo magacaabayo xilkan.

MARKUU TIXGALIYEY: Baahida loo qabo magacaabista La-taliye sare ee Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga.

Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu u magacaabay **Jihaan Xasan Sheikh Maxamuud** in ay noqoto La-taliye sare ee Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga.

Qoddobka 2aad

Xeerkan waxaa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho 04 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-048-23
TAARIIKH: 2-3-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRKA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxwaynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.87
MAGACAABIS HOWL-WADEENANADA GARSOORKA MAXKAMADDA CIIDANKA QALABKA SIDA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Faqradda 1aad, Xarafka'B 'ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960 kuna saabsan dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed.
MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee soo baxay23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Dalka Soomaaliyeed.
MARKUU ARKAY: Warqada Gudoomiyaha Maxkamadda Sare Ciidamada Qalabka sida **LR/CQS/010/23** ku Taariikhaysan **05/03/2023** kuna saabsan soo jeedinta **Magacaabista Howl-wadeenadda Garsoorka Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.**
MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la magacaabo Howl-wadeennada Garsoorka Maxkamada Ciidamada Qalabka Sida.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa saraakiisha magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo magacaabay jagooyinka ku hor qoran.

No.	Magaca	Jagada
1.	Dhamme XDS. Maxamed Xuseen Cumar	Ku xigeen Xeer Ilaaliye G.CQS
2.	Dhamme Bol. Carab Yuusuf Nuur	Ku xigeen Xeer Ilaaliye G.CQS
3.	L/x/le Bol. Axmed Iimaan Maxamed	Ku xigeen Xeer Ilaaliye G.CQS
4.	X/le Bol. C/baasid Maxamed Yuusuf Cumar	Ku xigeen Xeer Ilaaliye G.CQS
5.	X/le Bol. Maxamuud Saciid Maxamed	Ku xigeen Xeer Ilaaliye G.CQS
6.	L/x/le XDS. Cabdilaahi Cali Xasan	Kaaliye Maxkamadda CQS

Qodobka 2aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HHG-050-23
TAARIIKH: 26-3-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.88
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/054/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **08/03/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **Ex D/le Bol. 25142 C/shakuur Axmed Maxamuud** 29 jir ah ina Kaaho Takar Warsame, ku dhashay Galgaduud, ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, ka dib markii uu si bareer ah u dilay **Marxuum Ex D/le Bol. 7027 Xasan Maxamed Shire**, taariikhdu markay ahayd 31/01/2023, falkaas oo ka dhacay Degmada Waabari.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarsoπ 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-047-23
TAARIIKH: 25/03/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.89
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A' 'B' iyo "C" ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/150/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **08/03/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **Cabdi Jamaal C/laahi Xaahi** 32 jir ah ina Xaadsan Wacays, ku dhashay Sablaala, ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, ka dib markii uu si bareer ah u dilay **Marxuum Cabdi Xakiim Maxamuud Khaliif,** taariikhdu markay ahayd 16/07/2012, falkaas oo ka dhacay Degmada Wadajir.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-012-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.90
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/030/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **08/03/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle shabaab **Maxamed C/nuur Jiirow (Maxamed Dheere, Dr Fanax, Khaalid)** 37jir ah ina Maryan Guure Ciye, ku dhashay Hiiraan, kaaso ka tirsan kooxda alshabaab una qabilsanaa fulina weerarada iyo qaraxyda ay ka gaysato Gobolka Banaadir qaybna ka ahaa dhagara soo socda:

1. Taariikhdu markay ahayd 04/02/2022 abaaro 18:30 Maqribnimo xukunsanaha iyo afar kale oo uu horjooge u ahaa ayaa waxa ay weerar gaadmo ku qaadeen guri u degena Taliyaha Nabadsugidda Deegaanka Garasbaaley werarkaas oo ay ku geeriyooen 3 ruuxo kala ah 1. Marxuun **Farxaan Cabdi Guure 2.** Marxuun **Cali Yuusuf Sheeh Maxamd Caddow (Cali Mooge), 3.** Marxuun **Maxamed C/raxmaan C/qaadir** 4 jir ah, sidoo kale weerarkaas waxaa ku dhaawacmay 1. Mudane Nisa Abuubakar Muxuyadiin Axmed oo ahaa Taliyaha Nabad Sugidda Deegaanka Garasbaaley 2. Xareed Xaashi Xasan 3. Ibraahin Cabdi Gurre 4. C/qaadir Ibaahin Cadow 5. Axmed Salaad Kaabax 6. C/qaadir Maxamed Caddow 7. Daahir Xuseen Cali.
2. Taariikhdu markay ahayd 02/07/2021 wuxuu sahamin iyo hubin ku sameeyey qarax ka dhacay isgoyska jubba dhanka Degmada Shibis qaraxaas oo ay ku geeryoodeen 17 qofoood, oo ay ka mid yihiin:
   i) Marxuumad Fartuum Cabdiraxmaan
   ii) Marxuum Daa'uud Jimcaale Cadow
   iii) Marxuum Cabdilaahi Cali Raage
   iv) Marxuum Xabad Axmed Raage

Sidoo kalena waxaa ku dhawaacmay 7 qofood oo ay ka mid yihiin:

i. Cadiqaadir Xasan Maxamed
ii. Cabdilaahi Xasan Maxamed
iii. Maxamuud Maxamed Rooble
iv. Maxamed Axmed Farey
v. Cabdi yuusuf Cali

3. Taariikhdu markay ahayd 19/08/2021 wuxuu sahamin iyo hubin ku sameeyey qarax ka dhacay isgooyska jubba, dhanka Qaybta Guud ee Gobolka Banaadir, qaraxaas oo ay ku geeryooden 3qofood oo ay ka mid yihiin:
   i. **Marxuum S/A/le Bol. 20397 Cabdi Cabdulle Cumar**, kuna dhaawacmeen 4qofood oo kale.
4. Taariikhdu markay ahayd 10/02/2022 wuxuu gacantiisa ku soo waday nin naftii halige ah oo isku qarxiyey gaadhi bus ah oo ay saarnaayeen Ergada Reer Waqooyiga oo maraayey Isgooyska Ceelgaabta degmada Xamar jajab, qaraxaas oo uu ku dhintay hal askari oo magacaabi jiray **maxamed Xasan Cali**, kuna dhawacmeen 10 ruux oo kale oo ay ka mid yihiin:
   I. Cabdi Cali Axmed
   II. Axmed Sheekh Cabdi
   III. Cali Axmed Maxamuud
   IV. Ismaaciil Axmed Cali

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HHN-046-23
TAARIIKH: 21-3-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.91
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/608/2022** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **08/03/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle shabaab **Maxamed Cabdulle Abkoow Cumar (Biyamaalow)** 36jir ah ina Madiina maxamed Ibrahi, ku dhashay Jamaame, kaaso ka tirsan kooxda alshabaab una qabilsanaa soo galinta magaalada Muqdisho gawaadhida ay ka buuxaan walxaha qarxa, asagoo Derajada Ciidanka iyo aqoonsigiisa ku soo marin jiray Baraha Kaantaroolada ee Ciidanka Amnigu ilaalada ka hayaan, waxaana si gaar ah loogu helay in uu dhigay gawaadhi laga soo buuxiyey walxaha qarxa.

1. Tr.28/03///2019, uu gaadhi qaraxa dhigay maqaayada Baar Cagawayne Ex Bilsan Restaurant, qaraxaas waxaa ku dhimatay inta la xaqiijiyey ku dhawaad 11 qof oo uu ka mid yahay Xuseen Maxamed Mursal iyo Duulane Jaamac, halka Dhaawcyadana lagu qiyaasay 16 qof, oo uu ka mid ahaa Gudoomiyaha Majmaca Culimada Sooaaliyeed Dhibanwe Sheekh Yusuf Cali Caynte iyo Cabdi Xasan Golay(Rubac) oo ahaa dareewal Dowlada Hoose ka tirsan.
2. Inuu gaadhigiisa shaqsigaa ku qaaday laba qofood oo haligayaal ah oo ka tirsan kooxda alshabaab, isla markaana galiyey gudaha garoonka Aadan Cadde, halkaaso ay ka fuliyeen weerar toos ah, una ku geeryoday Marxuum **Ex D/le Bol 6338 Cabdirisaaq Aabi Cali** oo ka tirsan Ciidanka Gaarka ah ee Haramacad, falkaas oo ka dhacay gudaha airport-ka Aadan Cadde, Taariikhdu markay ahayd 23/03/2022.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-021-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.92
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY:	Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/014/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **08/03/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY:	Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle shabab **Ex Dhamme X. Shariif Maxamed Barkhadle Ayaanle (Jeego)** 53jir ah ina Xaawo Cali Salaad Geele, ku dhashay Mudug degmada Misil, kaaso ka tirsan ururka 62aad Caafimadka XDS, kaaso ka tirsan kooxda alshabaab una qabilsan soo galinta magaalada Muqdisho gawaadhida ay ka buuxaan walxaha qarxa, asagoo Derajada Ciidanka iyo aqoonsigiisa ku soo marin jiray Baraha Kaantaroolada ee Ciidanka Amnigu ilaalada ka hayaan, waxaana si gaar ah loogu helay in uu dhigay gawaadhi laga soo buuxiyey walxaha qarxa, Tr.04/02/2019 inuu dhigay gadhi laga buuxiyey walxaha qarxa ka soo horjeedka Muqdisho Mall gaar ahaan Maqaayada Baar Itaaliya horteeda halkaaso ay ku geeryoodeen 16 qof kuna dhawacmen 38 qof

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAW-005-23
TAARIIKH: 23
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.93
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY:	Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/QB60aad/052/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **22/02/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY:	Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **D/le Bol. yaasiin Maxamed Aadan(Kulaabte)** 23jir ah ina Asli Maxamed Cali, ku dhashay Xamar degan Baydhabo, kaaso si bareer ah oo ula kac ah u dilay **Marxuum Aadan Isaaq Ibraahim Aadan** taariikhdu markay ahayd 10/04/2019 dilkaas oo ka dhacay degmada Baydhabo.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-022-23
TAARIIKH: 21-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.94
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/QB60aad/050/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **16/02/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **D/le Dar Xuseen Maxamed C/nuur (Nuunow)** 23jir ah ina Timiro Dhaqane Axmed, ku dhashay degan Baydhabo, kaaso si bareer ah oo ula kac ah u dilay **Marxuum EX X/le Bol. Maxamed Guudow Aadan** taariikhdu markay ahayd 26/01/2018 dilkaas oo ka dhacay degmada Baydhabo agagaarka Shaneem Shantaraale.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-044-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.95
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY:	Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/QB60aad/049/2023** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **16/02/2023**.
MARKUU TIXGELIYAY:	Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **D/le Nisa C/raxmaan Cali Xasan Cali(Sugaw)** 40Jir ah ina Owliyo Maxamed Axmed ku dhashay Bakool degan Baydhabo, kaaso si bareer ah oo ula kac ah u dilay **Marxuum Maxamed Xasan Maxamd(Weydhaan)** taariikhdu markay ahayd 09/06/2019 dilkaas oo ka dhacay degmada Baydhabo.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAH-023-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE. LR.96
OGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A ' ' B ' iyo " C " ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **Lr/XG/CQS/QB60aad/056/2022** ee Codsiga Xeer Ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday **01/11/2022**.
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah dembiile gacan ku dhiigle **D/le Bol Abaadir Isaaq Nuur** 30 jir ah ina Caday macalin Daa'uud, ku dhashay Goof Gaduud Buurey degan Baydhabo, kaas si bareera oo ula kac ah u dilay xaaskiisa **Marxuumad Maslaxo Axmed Nuurow** taariikhdu markay ahayd 17/02/202 ddilkaas oo ka dhacay Degmada Baydhabo Xaafada isha.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilkan toogasho.

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA (-) OFFICE OF THE PRESIDENT (-)

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAW-043-23
TAARIIKH: 20 - 03 - 2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.97
MAGACAABIS HOWL-WADEENANADA GARSOORKA MAXKAMADDA CIIDANKA QALABKA SIDA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Faqradda 1aad, Xarafka'B 'ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960 kuna saabsan dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee soo baxay23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr.49 ee soo baxay 1970, kuna saabsan Dhismaa Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Sharciga Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka ee soo baxay 2023.

MARKUU ARKAY: Warqada Gudoomiyaha Maxkamadda Sare Ciidamada Qalabka sida **LR/CQ011/23** ku Taariikhaysan **05/03/2023** kuna saabsan soo jeedinta **Dallacaad iyo Magacaabista Howl-wadeenadda Garsoorka Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la magacaabo Howl-wadeennada Garsoorka Maxkamada Ciidamada Qalabka Sida.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa saraakiisha magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyey min hal darajo loona magacaabay mid walba xilka ku hor qoran.

No.	Darajada iyo Magaca	Darajada u dalacay	Xilka loo magacabay
1.	S/le XDS Deerow Ibraahin Xuseen	X/le	Garsoore Maxkamadda CQS
2.	K/s C.A. Yoonis Cabdulaahi Cumar	X/le	Garsoore Maxkamadda CQS
3.	K/s HSNQ Maxamed Cali Saciid	X/le	Garsoore Maxkamadda CQS
4.	K/s HSNQ Zakariye Ciise Maxamed	X/le	Garsoore Maxkamadda CQS
5.	K/s HSNQ Xasan Maxamed Nuur	X/le	Garsoore Maxkamadda CQS

6.	K/s Bol Yaxye C/Raxmaan Max'ud	X/le	Garsoore Maxkamadda CQS
7.	S/le XDS Xasan Siyaad Maxamed	X/le	Ku-xigeenka Xeer Ilaaliye G.CQS
8.	K/s HSNQ C/casiis cusman Faarax	X/le	Ku-xigeenka Xeer ilaaliye G.CQS.
9.	K/s HSNQ Cabdiraxmaan Cali Nuur	X/le	Ku-xigeenka Xeer Ilaaliye G.CQS
10.	S/le Bashiir Cabdi Macalin Max'ed	X/le	Ku-xigeenka Xeer Ilaaliye G.CQS
11.	K/s HSNQ. Abdishakuur Ali Abdalla	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS
12.	K/s HSNQ.Cabdishakuur Ali Abdalla	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS
13.	S/le XDS. Nuur Axmed Xasan	X/le	Agg/ha M & M/da MCQS
14.	K/s C.A Caydaruus Shiine raage	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS
15.	K/s C.A Hanad Khaliif Warsame	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS
16.	K/s Bol Maxamed Jamac Xuseen	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS
17.	K/s Bol Ibraahim Maxamed Osman	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS
18.	S/le XDS Asad Xasan Cabdiraxmaan	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS
19.	S/le XDS Claahi Xasan Isxaaq	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS
20.	S/le XDS CabdiFataax Cabdulqaadir Maxamed	X/le	Kaaliye Maxkamadda CQS

Qodobka 2aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 11 Maarso 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-024-23
TAARIIKH: 24-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA (T) OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE Lr.98
DALLACSIIN SARKAAL

Taariikh: 15 Maarso 2023

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo sarkaalkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran.

Lr.	Darajo	Magaca	U Dallacay
1.	S/Guuto	Odowaa Yuusuf Raage	S/Gaas

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-OUZ-73
TAARIIKH: 22-3-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxwaynaha J.F.S.
Mudane Dr Xasan Sheikh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.99

MAGACAABIDDA XUBNAHA GUDDIDGA MADAXA-BANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qoddobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qoddobka 134aad farqadiisa 6aad ee Dastuurka KMG oo tilmaameysa hanaanka magacaabista Guddida Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Qoddobka 99aad iyo 100aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: **Sharci Lr.119** ee **7dii Agosto 2013** kaaso lagu dhisay Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

MARKUU ARKAY: **Sharci Lr.27** ee **08/07/2014** ee ogolaanshaha ansixinta Xubnaha Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Warqada summadeedu tahay **GAS/B-13/KF2/23** ee ku taariikheysan **Maarso 13,2023** ee Qaraarka Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya kuna saabsan ansixinta Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Warqada summadeedu tahay **GSH/B-11/KF2/23** ee ku taariikhaysan **Maarso 11,2023** ee Qaraarka Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad Soomaaliya kuna saabsan ansixinta Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Warqada summadeedu tahay **WC&AD/XW/229/03/23** oo ku taariikheysan **01/03/2023** ee soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, kuna saabsan Magacaabista Xubnaha Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Warqada summadeedu tahay **XGK1L20/B11/2023** ee ku taariikheysan **14/03/2023** ee soo gudbinta Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Aqalka Sare kuna saabsan Qaraar Gole Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Warqadda Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha **XRW/118/03/23**, ku taariikhaysan **15/03/2023**, kuna saabsan Soo-jeedinta Magacaabidda **Xubnaha Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.**

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waaya-aragnimadda ay leeyihiin Xubnaha Guddida.

MARKUU TIXGALIYEY: Muhiimadda ay leedahay Dhameystirka Dastuurka iyo in la magaacabo Guddi howshaas dardargeliya.

Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa mudanayaasha iyo marwada magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo magacaabay Xubnaha Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

No.	Magaca	Jagada
1.	Mudane Burhaan Aadan Cumar	Gudoomiye
2.	Mudane Axmed Maxamed Jaamac	Xubin
3.	Mudane Maxamed Cabdalle Saalax	Xubin
4.	Marwo Farxiya Muumin Cali	Xubin
5.	Mudane Maxamed Xasan Idiris	Xubin

Qoddobka 2aad

Xeerkan waxaa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho: Maarso 18,2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-DUD-23
TAARIIKH: 26-3-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxwaynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.100 **Taariikh: 22 Maarso 2023**
MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.1 ee 02/03/1962 kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.7 ee 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirkka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqada summadeedu tahay **WC7AD/XW/0055/11/2022** ee ku taariikheysan **15/11/2022** kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaanimo ee Dr. Maxamed Cabdiraxmaan Aadan.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa **Dr. Maxamed Cabdiraxmaan Aadan** loo magacaabay in uu noqdo Nootaayo.

Qodobka 2aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-039-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.101 **Taariikh: 22 Maarso 2023**
MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.1 ee 02/03/1962 kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.7 ee 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirkka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqada summadeedu tahay **WC7AD/XW/0055/11/2022** ee ku taariikheysan **15/11/2022** kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaanimo ee Dr. Yaxye Maxamuud Maxamed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa **Dr. yaxye Maxamuud Maxamed** loo magacaabay in uu noqdo Nootaayo.

Qodobka 2aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkaan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAD-625-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE Lr.102
DALLACSIIN SARKAAL

Taariikh: 22 Maarso 2023

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo sarkaalkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran.

Lr.	Darajo	Magaca	U Dallacay
1.	S/Guuto	Maxamed cali Bariise	S/Gaas

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-038-23
TAARIIKH: 28-3-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxwaynaha J.F.S.
Mudane Dr Xasan Sheikh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 103

TAARIIKH: 22 Maarso 2023

MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA ah ee XASILINTA iyo ILAALINTA ARRIMAHA RAYIDKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista ergay gaar ah ee xasilinta iyo ilaalinta arrimaha rayidka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan, waxa uu u magacaabay **Mudane Maxamed Cabdi Waare** in uu noqdo Ergayga Gaarka ah ee Xasilinta iyo Ilaalinta Arrimaha Rayidka.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-037-23
TAARIIKH: 26-03-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 104 **TAARIIKH: 22 Maarso 2023**

MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA ah ee ARRIMAHA SOMALILAND

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista ergay gaar ah ee arrimaha Somaliland.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan, waxa uu u magacaabay **Mudane Cabdikariim Xuseen Guuleed** in uu noqdo Ergayga Gaarka ah Arrimaha Somaliland.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-036-23
TAARIIKH: 26-3-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

Tariikh: 30/03/203

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 119

Xeerka Qaraarka Maareynta Dhibaatooyinka Gaadiidka Bajaajta

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay:	Qodobka 99aad farqadaha(a,b,e iyo f) ee Dastuurka KMG.
Markuu arkay:	Qodobka 100aad farqadaha(a) iyo (d) ee Dastuuka KMG.
Markuu dhageystay:	Talada Guddigga Ka Talo Bixinta Tabashooshooyinka iyo Maareynta Arrimaha Gaadiidka Bajaajta.
Markuu arkay:	Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/03/2023,** kuna saabsan **Qaraarka Maareynta Dhibaatooyinka Gaadiidka Bajaajta** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyey.
Markuu Garwaaqsaday:	In ay lagama maarmaan tahay in si adag looga jawaabo Cabooshiyinka wadayaasha Bajaajta lana xakameeyo wax yaabaha sababa dhibaatooyinka soo laalaabta ee Gaaddiika Bajaajta.

Wuxuu Xeeriyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/03/2023,** kuna saabsan **Qaraarka Maareynta Dhibaatooyinka Gaadiidka Bajaajta** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyey.

Qodobka 2aad

1. Laga bilaabo 1da Abril 2023, waxaa si kumeel gaar ah loo hakiyay soo dejinta Mooto Bajaajta, Mooto laba lugoodlayda iyo Mooto gaari.

2. Laga billaabo 1da illaa 30ka April 2023 waxaa la tirakoobayaa dhammaan Gaadiidka Bajaajta, sidoo kale waa in loo midabeeyo labo nooc oo kala duwan, loona sameeyo labo summadood oo kala ah **A** iyo **B.** Mulkiileyaasha Bajaajyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir ayaa masuuul ka ah fulinta howshaas.

3. Qof da'diisu ka yar tahay 18 sano lama siin karo ruqsadda wadidda Mooto Bajaajta iyo noocyada kale ee Mootooyinka.

4. Laga bilaabo 1da May 2023 waxaa la joojiyay bixinta taarikada mootooyinka illaa amar dambe.

Qodobka 3aad

Waxaa Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada oo si buuxda u kaashaneysa Maamulka Gobolka Banaadir, iyo hay'adaha amniga loo igmaday hirgelinta Xeerkan .

Qodobka 4aad

Qaraarka Maareynta Dhibaatooyinka Gaadiidka Bajaajta waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda FS

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Taariikh: 30/03/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 120

XEERKA; XEER NIDAAMIYAHA MAAREYNTA DAREER-HOOSAADKA BATROOLKA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuuka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summadeèdu tahay **WBM/XW/GB/0029/2023** ee ku taariikheysan **08/03/2023**,kuna saabsan codsi Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/03/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo in la meel-mariyo Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka.

Wuxuu Xeeriyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/02/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2aad

Waxaa Waasaradda Batroolka iyo Macdanta loo igmaday fulinta iyo meel-marinta Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka.

Qodobka 3aad

Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Jamhuurita Federaalka Soomaaliya

WASAARADDA BATROOLKA IYO KHAYRAADKA MACDANTA

XEER-NIDAAMIYAHA MAAREYNTA DAREER-HOOSAADKA BATROOLKA

(PETROLEUM DOWNSTREAM REGULATION)

March, 2023

XEER GOLE WASIIRO

XEER-NIDAAMIYAHA MAAREYNT DAREER-HOOSAADKA BATROOLKA LR. XX SOO BAXAY XX JUUN 2021

Si waafaqsan Sharciga Batroolka Soomaaliyeed Qodobkiis 45aad,Wasaaraddu waxay soo saartay Xeer-nidaamiyahaan:

QODOBKA 1AAD :
MAGACA XEER NIDAAMIYAHA

Xeer-nidaamayahan waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Dareer-hoosaadka shidaalka ee 2023.

QODOBKA 2AAD:
BAAXADDA XEER NIDAAMIYAHA

Xeer-nidaamiyahanwaxaa lagu maamulayaa dhamaan hawlaha dareer hoosaadka shidaalka iyo gaaska ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo u qaybsan sidaan:

1- Soo dajinta, sifaynta shidaal cayriin ah;
2- Keenista, kaydinta, qaybinta, iskuqaska (blending) iyo tafaariiqda shidaalka sifaysan;
3- Soo dajinta, habaynta, kaydinta, qaybinta iyo tafaariiqda gaaska dabiiciga ah iyo gaaska dareeraha ah;
4- Soo dajinta shidaalka Bio-fuels
5- Haraaga laga soo saaro shidaalka sida laamiga, walxaha laga sameeyo lugaha baabuurta, ama dareerayaasha kale ee laga helo shidaalka sida; olyada loo isticmaalo motoorada (engine oil), xayrta ama garaasada (grease), islis-yareeye (lubricants) iyo olyada lagu shubo taangiyada gawaarida oo loogu talagalay in lagu sifeeyo shidaalka, si loo yareeyo wasaqaynta hawada
6- Kaydadka shidaalka iyo gaaska;
7- Maqaaziinada haamaha(ambuuboyinka) gaaska dabiiciga ah; iyo
8- Iyo hawlakasto oo laxiriira arrimaha kor lagu soo sheegay oo ay Wasaaraddu ay ogolaato.

QODOBKA 3AAD:
UJEEDDADA XEER NIDAAMIYAHA

Ujeeddada Xeer nidaamiyaha waa:

1. In dib loo qaabeeyo doorka Xukuumadda ee Dareer-hoosaadka Shidaalka iyo gaaska ,maareyntiisa iyo howlaha kale ee la xiriira hawlahaas,
2. In la abuuro Halbeeg lagu ilaaliyo tayada shidaalka kaasoo lagu salaynayo halbeega caalamig ah iyo habdhaqanka wanaagsan ee maamulka iyo maaraynta dareer hoosaadka shidaalka.
3. In hoos loo dhigo khatarta caafimaad iyo deegaan ee la xiriira hawlaha ka dhalan karo kaydinta, daabulaadiisa iyo tafaariqda shidaalka iyo gaaska.

4. In lagu maareeyo tayada shidaalka dalka la keeno iyo in laga hortago keenista shidaal tayadiisu ka hooseeyso tayada shidaalka ee uu tilmaamayo xeer-nidaamiyahan, isla markaana aan buuxin shuruudaha heerka (standard) shidaalka gobolka bariga Africa iyo caalamkaba.

QODOBKA 4AAD:
ERAYBIXIN

Hadaan si kale loogu xusin dhamaan micnaha erayada xeerkan waxay yeelanayaan sida lagu qeexay sharciga Batroolka,iyadoo ereyada soo socda ay yeelanayaan micnayaasha ku hor qoran:

1. **Dareer-hoosaad**: waa wadarta shaqooyinka la xiriira shidaalka ama Haydroo-kaarboonka, laga soo billaabo soo dejinta, kaydinta, qaybinta, sifaynta, isku-milanka (blending) iyo ka ganacsiga. warshadaynta betro-kiimikada ee loo adeegsado haraaga shidaalka si loo sameeyo daawada milmeeyaasha cayayaan-dileeyaasha, iyo caagga.
2. **Shidaalka Diyaaradaha**: Waa nooc ka mid ah Shidaalka oo leh tayo sare awoodna siinaysa matoorada dayaaradaha.
3. **Barta Holaca:**waa barta marka la kululeeyo shidaal uu bixiyo bukhaar asagoo ku dhex holcaya hawada.
4. **Kaalin Shidaal:** waa dhismo si qaabaysan loogu talo galay oo siiya baabuurta shidaaliyo adeegyo kale ayagoo adeegsanayo bambo cadaadis ku shaqaysa oo la xariirta dhismo dhuleed lagu kaydiyo shidaalka. Waxay kaloo leedahay akhriye ku tusinaya mugga shidaalka uu baabuurka qaatay iyo qiimaha mugga shidaalka.
5. **Xukuumadda:**waxaa loola jeedaa Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyadoo adeegsanaysa saraakiisha hay'adaha, wakaaladaha ama Wasaaradaha, waana laanta fulinta ee Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
6. **Sharciga:** waxaa loola jeedaa Sharciga Lr. 19 ee soo baxay 2020 laguna magacaabo Sharciga Batroolka Soomaaliya.
7. **Wasiir**:- waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaarad ka tirsan Xukuumada waqti ka waqti mas'uul ka ah inuu maamulo sharcigan oo hada ku suntan Wasiirka Batroolka iyo Macdanta.
8. **Wasaaradda**- waxaa loola jeedaa wasaaradda waqti ka waqti mas'uul ka ah inay maamusho sharcigan, sida ay qaabaysay xukuumad taas oo ku suntan Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
9. **Nafto:** waa dareere kasta oo loo isticmaalo matoorada naftada ah kaasoo ah maxsuulka sifaynta saliida cayriinNaftada. Waa iskudhis kiimikaad oo leh moolekiyuul silsilladda kaarboonku tahay **min 8 illaa 21;** heerkulka uu ku karkaro wa 200-350 ˚C, marka sifaynta salidda cayriin socoto.
10. **Maxsuulka shidaalka (Petroleum by-product):** waa haydrokaarboon lagu daray waxyaabo kale oo ka yimaada sifaynta saliida cayriin oo aan ahayn bansiin, nafto iyo shidaalka diyaaradaha.

11. Halbeeg iyo Hogatus:-Halbeegyada ku cad Xeer-nidaamiyahan waa la bedeli kara markii loo baahdo haddii la arko kala duwanaansho u dhaxayso xeerarka iyo halbeegyada ama hogatuska halkan lagu sheegay.

QODOBKA 5AAD:

MAAREYNTA IYO XAQIIJINTA TAYADA SHIDAALKA

Wasaaradda Batrrolka iyo Macdanta waxay masuul ka tahay howlaha maareeynta iyo korjoogtaynta dhamaan dareer-hoosaadka shidaalka iyo gaaska dabiiciga ah ama gaaska LPG ee loo isticmaalo kariska cuntada.Wasaaradda ayay masuuliyad ka saarantahay la socodka iyo ka talinta hawlaha dareer hoosaadka iyo xallinta murannada la xiriira howlaha dareera hoosaadka.

QODOBKA 6AAD:

HOWLAHA IYO WAAJIBAADKA SHAQO EE WASAARADDA Wasaaradda iyadoo raacayso qorsha howleedkeeda isla markaana qabanayo shaqooyinka uu tilmaamayo xeer-nidaamiyahan ayay dhaqan gelinaysaa qabashada howlahan hoos ku qoran:

I. Wasaaradda ayaa ka masuul ah dhaqangelinta xeer-nidaamiyahan iyadoo la kaashanayso hay'adaha aay kala dhexeeyaan wada shaqaynta.

II. Wasaaradda iyo ciddii aay u idmato ayaa ka masuul ah qabashada howlaha ilaalinta iyo baarista dareer-hoosaadka shidaalka iyo gaaska dabiiciga.

III. Wasaaraddu waa in aay diiwaan geliso ganacsatada soo dejisa shidaalka iyo gaaska dabiiciga, ganacsatada iibiso iyo ganacsatada leh kaalimada shidaalka lagu iibiyo.

IV. Waa in wasaaradda ama ciddii uga wakiil ah xaqiijiyaan in ganacsatadu buuxiyeen shuruudaha ka ganacsiga shidaalka iyo gaaska dabiiciga ka hor inta aysan wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha siin ruqsada ka ganacsiga shidaalka ama gaaska dabiiciga.

V. Waa in Wasaaraddu u furtaa ganacsatada danaynaysa ka ganacsiga shidaalka ama gaaska dabiiciga aqoon kororsi ama seminaaro lagu fahmsiinayo heerka tayada shidaalka ama gaaska dabiiciga ee dalka la keeni karo, isla markaan loo sheego khatarta ka dhalan karta kaydinta, shubista iyo daabulista shidaalka haddii aan si sax ah loo maareeyn.

QODOBKA 7AAD:
KORMEERAYAASHA GOOBAHA SHIDAALKA

1. Shaqaalaha wasaaradda ayaa kormeerayo gobaha shidaalka iyo gaaska lagu kaydiyo iyo goobaha lagu iibiyo iyagoo hubinayo tayada shidaalka iyo gaaska.
2. Xeer nidaamiyahu waxuu awood u siinayaa shaqaalaha wasaaradda ama ciddi kale ee loo idmado ee kormeerayo goobaha lagu iibiyo shidaalka iyo gaaska in;
   i) Aay joojiyaan iibka shidaalka iyo gaaska aan la hayn tayada uu xeer-nidaamiyahu tilmaamay lana ogol yahay in la iibiyo.
   ii) Aay xiraan gebi ahaan goobaha uusan xeer-nidaamiyahu u fasaxayn in shidaal iyo gaas lagu iibiye, oo aay ka dhalan karto khatar naf iyo hanti.

QODOBKA 8AAD:
NOOCA, TAYADA, HEERKA IYO BAARISTA 1. Noocyada

Shidaalka ee Dalka la soo gelin karo

Noocyada shidaalka dalka la gelin karo waxaa ku jira: Nafto, Bansiin, Gaaska Dabiiciga ah (LNG ama LPG), Shidaalka Diyaaradaha, Keerosin, Shidaalka culus iyo kan Bio Fuel.

2. Shidaalka khatarta ah:

Waa shidaal bartiisa hollaca ay ka hoosayso 22.8 ˚C. Shidaalkaan waa in laga taxadiraa weelka uu ku jiro iyo heerkulka deegaanka ku wareegsan**,** waana in lagu calaameeya Shidaal khatar ah laguna qoraa Somali, Carabi iyo Ingiriis.

3. Tayada Shidaalka

Shidaalka la keenayo waa inuu waafaqsan yahay heerka tayada ee Bariga Afrika ee ku lifaaqan Xeer-nidaamiyahaan

4. Halbeegga Shidaalka Diyaraadaha

I. Shidaalka diyaaradaha waa inuu ahaadaa nooca Jet A-1 oo ah Keerosin oo ku barafooba barta -47 degree celcius (*c),

II. Sifaha halbeega waxaa kaloo sii qeexa ASTM D1655-

5. **Heerka (Standard) Gaaska Dabiiciga ah**

a) Gaaska dabiiciga ah ee la keeni karo waa inuu sammaysankiisa kiimikaad ahaadaa sidaan:

Methae (94.9%), Ethane (2.5%), Propane (0.2%), Inta soo hartay oo ka samaysan Iso-Putane, Putane caadi ah, Iso-Pentan, Pentane caadi ah iyo Hexane.

b) Waa inuu waafaqsan yahay astaamaha hoos ku qoran:

   i. Carbon-dioxide waa inuu ka yar yahay 2%,

   ii. Nitrogen waa inay ka yar tahay 3% mug ahaan,

   iii. Oxygen waa inuu ka yar yahay 1%.

   iv. Waa inuusan ku jirin adke iyo wax la mid ah:.

c) Halbeegga qeexaya tayada gaaska dabiiciga ah waa ISO 75.060.

6. Shaybaarka Shidaalka

Wasaaraddu waxay awood u leedahay inay muunad ka qaaddo shidaal dalka soo gelaya kaddibna ay baarto tayadiisa iyadoo waafajinayso halbeega dalku leeyahay lana raacayo habraaca soo socda:

I. Cidda fulineysa howlaha sheybaarka

Wasaaraddu waxey fulin kartaa ama u idman kartaa howlaha la xiriira sheybaarka Shidaalka shirkad ku takhasustay farsamada baarista tayada batroolka kuna xeeldheer arrimaha baarista iyo hubinta heerka tayo ee shidaalka si waafaqsan hannaanka jaango'an ee caalamiga ah loo yaqaan ISO17025.

a) Shirkadda muunada loo hubinayo waxey bixinaysaa Khidmadda lagu qabanayo hawsha barista. Qiimaha khidmada baaristu wuxuu ku cadyahay jadwalka qodobka 2aad.

b) Caddaynta Warqadda Lacag Qabashada: Wasaaradda ama cidda ay u idmatay howlaha barista Shidaalka waa iney bixisaa warqadda caddeyneysa lacag qabashada kuna keydisaa xafiiska nuqul Isla markaasna diiwaan gelisaa natiijada sheybaarka. Sarkaalka xafiisku waa inuu siiyaa shirkadda koobi natiijadii sheybaarka ee hubinta tayada.

II. Habka fulinta Sheybaarka:

a) Qofka soo dhoofinaya shidaalka waa in uu u soo gudbiyaa Wasaaradda, Hay'adda Taya Dhowrka iyo Shirkada Loo wakiishay, todobbo maalmood ka hor inta uusan markabku ku soo xiran Dekedaha Soomaaliya, shahaado caddeyneysa tayada shidaalka la soo dhoofinayo taas oo waafaqsan nidaamka caalamiga ah ee ISO17025.

b) Shahaadada tayada shidaalka waa in ay si faahfaahsan u caddeysaa asalka badeecadda, aqoonsiga gaarka u ah shixnada iyo meesha laga keenay.

c) Waxaa reebban in shidaal suuq madow ah la soo geliyo Soomaaliya. Waxaa sidoo kale reebban in Soomaaliya la soo geliyo shidaal ka sameysan isku-milanka shidaal nooc iyo tayo ahaan kala duwan.

d) Nuqul shahaado oo ay soo saartay hey'ad madaxbannaan caddeyneysana tirada shidaalka saaran markabka waa in loo soo gudbiyaa Wasaaradda iyo Hay'adda Tayo dhowrka.

e) Sarkaal ka socda Wasaarada Batroolka,Sarkaal ka socda Hey'adda Tayadhowrka Soomaaliya iyo Sarkaal ka socda Shirkadda u xilsaaran sheybaarka tayada iyo tirada shidaalka ayaa muunad ka qaadaya shidaalka saaran markabka ka hor inta aan la siin oggolaansho lagu dejinayo.

f) Baarista muunada waxaa goobjoog ka noqonaya qofka ka socda Wasaarda ,qof ka Socda Hey'adaha Taya-dhowrka Soomaaliya iyo qofka soo dhoofsaday shidaalka ama cid isaga uu soo wakiishay. Natiijada barista waxaa lala wadaagayaa Wasaaradda, qofka soo dhoofsaday shidaalka iyo hay'adaha u xilsaaran arrimaha furdooyinka.

g) Shirkadda waxey soo saareysaa shahaado caddeyneysaa tirada shidaalka ee markabka iyadoo ku saleyneysa haamaha loogu talogalay keydinta shidaalka, waxeyna u gudbineysaa hey'adaha u xilsaaran furdooyinka si ay u soo saaran canshuurta ku waajibtay. Markabka
sida shidaalka waa in mar waliba uu heystaa shahaado caddeyneysa cabirka haamanka keydinta shidaalka.

h) Waxaa reebban in markabka sida shidaal loo oggolaado in dejiyo/furto isaga oo aanan helin shahaado caddeyneysa natiijada baaritaan ee tayada iyo tirade shidaalka uu sido.

i) Wasaaraddu waxey soo saareysaa hage-fulineed oo si faahfaahsan u caddeynaya fulinta arrimaha ku xusan qodobkaan.

j) Wasaarada ama shirkadda loo wakiishay baaritaanka tayada shidaalka waxa aay awood u leeyahiin in aay baaraan kaalimada iyo meel walba oo lagu iibinayo shidaal dalka gudahiisa iyo gawaarida xamuulka shidaalka si loo hubiyo tayada shidaalka

III. **Cabasho go'aanka Sheybaarka:**

Haddii ay Shirkaddu ku qanci waydo, go'aanka sheybaarka waxay ka caban kartaa go'aankaas iyadoo codsanayso dib u eegis iyo in lagu sameeyo shaybaar kale ayadoo una gudbinaysa Cabashadeeda Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta, XJFS

IV. **Xaqiijinta Natiijada Sheybaarka:**

Muunad cusub ayaa laga qaadayaa xamuulka mar labaad si loo hubiyo xamuulkaasi inuu waafaqsan yahay heerka tayada. Wasaaradda haddii ay u caddaato in shidaalka ama gaaska la baaray uusan waafaqsanayn xeer-nidaamiyahaan, waxey go'aamineysa in dib loo celiyo shidaalkaas ama gaaskaas.

V. Iskaashiga Wasaaradda iyo hey'addaha kale ee Dowladda:

Wasaaraddu waxey iskaashi la yeelan kartaa hey'addaha Dowladda marka la fulinayo howlaha sheybaarka Shidaalka iyo Gaaska ee ku xusan qodobkaan. Sida hay'adaha amniga oo aan looga maarmayn in aay mar walba la socdaan howlwadeenada sameeynaayo Baaritaanka tayada shidaalka

QODOBKA 9AAD:
HABRAACA SOO-DEJINTA, KAYDINTA, QEYBINTA & TAFAARIIQDA 1. Diiwaan

gelinta shirakadaha Shidaalka:

Shirkadaha ka ganacsada shidaalka iyo gaaska waxaa looga baahan yahay shuruudaha hoose iney soo buuxiyaan:

I. Waa inay haysataa rukhsad ganacsi oo ka soo baxday Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, kuna cad yihiin cinwaanka ganacsiga, teleefoon nambar iyo mulkiilaha shirkada ganacsiga shidaalka.

II. Waa inay u qaabaysan tahay shirkad ahaan, si waafaqsan sharciga shirkadaha 2019 ee JFS,

III. Waan in shirkada leedahay xarun kayd shidaaal ama u kiraysan tahay oo la timaadaa heshiiskii ay ku kuraysatay dhigtaana shidaal dhan 400 tan.

IV. Waa inay iska diiwan-geliso Wasaaradda Batroolka& Macdanta;
V. Waa iney leedahay ceymis la xiriira ganacsigeeda, Dowladuna aqoonsan tahay.

2. **Noocyada shirkadaha dareer hoosaadka:** Shirkadda waa inay iskudiiwaan gelisaa hadba shaqada ay ka qabato dareer-hoosaadka batroolka., iyadoo loo qaybinayo shaqada shirkadaha daneynaya ka ganacsiga shidaalka.
   I. Soo dejinta,Keydinta iyo Daabulida shidaalka Gaska Nooca JET-A10 guud.
   II. Soo dejinta,Keydinta iyo Daabulida Gaska Cuntada.
   III. Ka ganacsiga kaalimaha shidaalka; iyo
   IV. Sifaynta iyo isku-milanka.

3. Qaadashada & Muddada Rukhsadda

I. Wasaaradu waxay kaga soo jawaabaysa dalabka rukhsadaha mudo 4 casho ah.
II. Dhammaan shirkadahaas waa inay Wasaaradda ka qaataan rukhsad shaqo ay ku hawlgalayaan .
III. Muddada rukhsad kasta waa hal sano oo la cusbonaysiin karo.
IV. Khidmada cusbooneysiinta Ruqsada waxay ku caddahay jadwalka 2aad.

4. Wareejinta Rukhsada:

1. Shirkadda hadii la gato ama magaceeda isbeddelo, ruqsada waxaa loo wareejin karaa shirkadda cusub, iyadoo ogaysiis qoraal ah la soo siinayo Wasaradda.
2. Ruqsad waxaa la wareejin karaa oo keliya marka ay Wasaarada ka hesho ogolaasho.
3. Khidmada wareejinta ruqsada waa inay noqota mid waafaqsan sida ku cad jadwalka 2aad.

5. Ganaax iyo kala noqoshada Rukhsada:

Shirkaddii u hoggaansami weydo ilaalinta heerka (standard) shidaalka si joogto ah waxaa laga qaadayaa tallaabo anshax ah iyadoo:

I. Marka ugu horreysa digniin qoraal ah la siinayo,
II. Marka labaad haddii ay shirkaddu aysan sixin khaladaadkeeda muddo 10 maalmood ah marka laga bilaabo xilligii ay heshay qoraalka digniinta ah, waa la ganaaxayaa iyadoo lagu caddeyn doono qoraalka nooca ganaax lacageed ee lifaaqa 3aad.
III. Ugu dambayna waxaa lagala noqonayaa ruqsada.

QODOBKA 10AAD:
HAWLAHA SHIDAALKA

1. Soo Dejinta Shidaalka

I. Shirkadaha ku howlan soo iibinta shidaalka waa inay ilaaliyaan sharciyada caalamiga ah ee la xiriira ka ganacsiga shidaalka.
II. Shirkadaha soo dejinta shidaalka waa inay ka soo gadaan shidaalka suuqa muuqda, oo ay ka fogaadaan saliida lagu gado suuqa madow ama aay waddanka keenaan shidaal tayadiisa hooseeyso

III. Shirkaduhu ma soo keeni karaan dalka shidaal aan buuxinayn shuruudaha & Heerka tayo ee shidaalka dalka.

IV. Ka hor intaan la baarin tayada shidaalka, waa in la hubiyaa shixnadda shidaalka tayada uu leeyahay oo ku qoran dokumentiga tayada ee milkiilaha shidaalka uu ka soo qaatay meesha uu ka soo gaday.

V. Sida ku cad dokumeentiga tayada ee lagu soo gaday shidaalka, haddii aysan waafaqsaneyn tayada shidaal ee dalka uma baahna sheybaar tayo waxaa lagu celinyaa shixnaddaas markabka sida.

VI. Hadday caddaato inaan dokummenti tayo la socon shixnadda shidaalka ee dalka soo gelaya waxaa in:

a) La ganaaxayaa markabka sida shixnadda.
b) La ganaaxayaa shirkadda soo gelisay shixnaddaas dalka

2. Daabulidda Gaaska Dabiiciga ah

I. Gaaska dabiiciga ah waxuu u baahan yahay maareyn gaar ah , waana in lagu soo daabulaa/Safriyaa haamo ku habboon oo adag oo iska xajin kara cadaadiska iyo heerkulka.

II. Cadaadiska iyo heerkulka waa in la hubiyaa markasta oo la maareynayo shixnad Gaas Dabiici ah.

3. Keydinta Shidaalka diyaaradaha

Kaydka shidaalka diyaarada waa inay ku yaallaa meel aan ka fogeynin gegidda diyaaradaha. Shixnadeynta shidaalka waxaaa loo isticmaalayaa haamo iyo gaadiid ku haboon oo leh shuruudaha looga baahan yahay heer caalami sida in ay lahaato dabdamis.

4. Shirkadaha Daabulidda Shidaalka Waddanka Gudihiisa

Shirkad diiwaan-gashan haysatana rukhsad ayaa loo oggolyahay inay daabusho shidaalka oo u qeybiso kaalimada shidaalka.

5. Gaadiidka Haamaha Shidaalka

Gaadiidka xambaarsan haamaha shidaalka ee dhulka mara waa inay lahaadaan heerla mid ah heerka caalamiga ah, isla markaana ay awood u leeyihiin ineymaareeyaan shidaalka ku shubaan godkii loogu talagalay.

6. Wadayaasha gaadiidka xamuulka shidaalka.

Wadayaasha gaadiidka haamaha xamuulka shidaalka waa inay leeyihiin ruqsad wadida ee heerka sare una tababaran yihiin ka hortagga khataraha ku iman kara dhinacyada caafimaadka iyo deegaanka.

7. Kaalimaha shidaalka

I. Kaalimaha shidaalka waa meel u habaysan in lagu gado shidaal tafaariiq ah.

II. Kaalimahu waxaa loo dhisayaa si looga nabadgeliyo gubasho iyo dhibaataynta bay'ada.

III. Milkilaha Kaalinta Shidaalka waa inuu qaataa Ruqsad loogu oggolaanayo inuu hawlaha shidaalka goobtaasi uu ka fuliyo.Meel aan ku haboonayn lagama dhisi karo kaalin shidaal sida suuqyada,xaafadaha iyo meel u dhow iskuullada iyo isbitaallada iyo meelaha qolalka yaryar.

8. Shidaalka Jidadka lagu gado.

Si loo badbaadiyo caafimaadka bulshada iyo hantidooda, loogana hortago khatar ku timaado deegaanka, shidaalka tafaariiqda ah waxaa lagu iibin karaa oo keliya Kaalin Shidaal. Sidoo kale ganacsatada loo oggolaaday inay shidaalka ka

iibiyaan maraakiibta dekedaha ku soo xirto waa in ay fasax uqaataan hawlahooda. Meel aan kaalin shidaal ahayn laguma gadi karo shidaal sida fuustooyin ama caagag, ciddii lagu helana waxay mutaysanayaa ciqaab si waafaqsan Shuruucda Dalka.

9. Shuruuda kaalimada shidaalka

I. Bedka ugu yar ee kaalin shidaal yeelan karto waa 20m x 30m
II. Kaalin shidaal waa inay leedahay laba marin oo furan, oo midna laga soo galo, midna laga baxo.
III. Kaalimaha waa inay lahaadaan haamo lagu kaydiyo shidaalka oo dhulka hoostiisa ku jira si nidaamsanna loo farsameeyey ugu yaraan 3 xabo.
IV. Kaalin shidaal waa inay leedahay adeegyada looga hortago gubashada iyo fatahaadda shidaalka, lana waafajiyo heerarka caalamiga ah.
V. Kaalinta shidaalku waa in ay leedahay qalab loo adeegsanayo bamboo cadaadis ku shaqeysa

VI. Kaalinka Shidaalku waa inay haystaa qalab dab hadduu kaco lagu damiyo.
VII. In la soo cadeeyo inta ay isku jiraan 2 da kaalimood si waafaqsan sharciga.

10. Adeegyada kale ee kaalimaha Shidaalka:

Kaalimada shidaalka waa inay bixin karaan adeegyo dheeraad ah sida iibinta saliidaha matoorka, lugaha baabuurta, xeyrta birta, adeegga lugaha, dhaqidda gawaarida, goob lagu qaxweeyo, musqulo ay adeegsan karaan lab iyo dhedig, iyo dukaan (mini-mart ah)

11. U hoggaansamidda shuruudaha kaalimaha shidaalka: Kaalimaha shidaal ee si buuxa u shaqeeya ka hor inta uusan Xeer-nidaamiyahaan dhaqangelin, waxaa lagu sameynayaa qiimeyn ku aaddan buuxintooda shuruudaha kaalimaha shidaalka looga baahan yahay. Kaalintii buuxisa shuruudahaasi waxaa la siinayaa rukhsadda ay ku howlgasho.

QODOBKA 11AAD:
ILAALINTA DEEGAANKA IYO NOOLAHA

1. ILAALINTA DEEGAANKA

I. Dhamaan howlaha la xariira batroolk laga soo billaabo dareer Koraadka illaa Dareer Hoosaadka, wa inay waafaqsan yihiin Sharciga Ilaalinta Biiada Soomaaliya, Xeerarka iyo halbeegyada kale ee caalamka; sida kan Qaramada Midoobay Fadhigiisii Bii'ada iyo Horumarinta (United Nations Conference on Environment and Development - UNCED) ee Rio 1992.

II. ~~Gaadiidka qaada shaxnadda shidaalka waa inuu ilaaliyo bay'ada (badda dalka & tan caalamiga) iyo berriba~~ inta uu sido shidaalka iyo markuu ku soo xirto dakadaha Soomaaliya. Waa in mar kasta la ilaaliyaa fayaqabka badda iyo dhulka oo aanu ku daadanin shidaal.

III. Dhibaata kasta oo ka dhalata soo qaadista iyo dejinta xamuulka shidaalka waxaa mas'uul ka ah gaadiidka sida xamuulka & shirkadda iska leh shidaalka.

2. BADBAADADA NOOLAHA.

Dhammaan shaqooyinka la xiriira batroolka laga bilaabo dareer koraadka illaa darer hoosaadka waa inay badbaadiyaan noolaha ku nool deegaanka ayagoo raaca hab waafaqsan Xeerka Badbaadada noolaha, xeerarka iyo halbeegyada kale ee caalamka sida;

I. Ka hortaga Shilalka ee Qaramada Midoobay Barnaamijka
II. Bay'adda (UNEP) iyo ilaalinta caafimaadka shaqaalaha & noolaha kaleba.

QODOBKA 12AAD:
KAYDKA ISTIRAATIJIGA EE SHIDAALKA

1. Xukuumadda Soomaaliya waxaa xil ka saran yahay in mar waliba dalka laga heli karo shidaal ku filan, gaar ahaan xilliyada uu dalku waajaho xaalado adag sida culays ka yimaado dhaqdhaqaaqa shidaalka caalamiga ah iyo marka dalka la soo gudboonaado xaalado ay ka mid yihiin dagaallo iyo musiibooyin dabiici ah sida abaaro.
2. Si taasi loo xaqiijiyo Wasaaraddu waxay ku wargelinaysaa ganacsatada soo gelisa shidaalka dalka inay iska diiwaangeliyaan Wasaaradda, mid walibana ay oggolaato in mabdi'yan uu dalku yeesho kayd shidaal oo istiraatiiji ah kaas oo looga gudbo duruufaha aan kor ku xusan.
3. Kaydka qorsheysan wuxuu noqon karaa ilaa 20.000 MT sannadkiiba taasoo laga rabo in mar waliba laga heli karo kaydadka shidaalka.
4. Shirkadii fulin waydo shuruudahaasi waxaa ka mamnuuc ah inay dalka soo geliso wax shidaal ah.

5. Shirkadaha shidaalka ee ruqsadaha haysta waa inaysan ku xadgudbin qoondaha kaydka shidaalka iyadoo aan oggolaansho ka haysan Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
6. Iyadoo la tixgelinaayo siyaasadda amniga tamarta (Energy security Policy) ee dowladda, iyo si waafaqsan sharciga Batroolka Soomaaliya qodobkiisa 18aad ee tilmaamayo howlaha iyo waajibaadka shaqo ee wasaaradda; wasaaraddu waxaay dib ula soo ceshanaysaa Haamihii shidaalka ee wasaaradu hore u isticmaali jirtay ee dekedda, waxayna maalgashi ku samaynaysaa dhismaha haamo shidaal cusub si loo hubiyo kayd shidaal oo dabooli karo baahida Dalka

QODOBKA 13AAD:
HANTIDA MAGUURTADA AH EE WAKAALADA BATROOLKA SOOMAALIYA

Dhammaan hantidii Qaranka ee Wakaalada Batroolka Soomaaliya lahayd wixii ka horeeyay 31 December 1990[kii] waxaa milkiyadeeda yeelanaya masuulna ka ah badqabkeeda, kiraynteeda iyo ilaalinteeda Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

QODOBKA 14AAD:
FULINTA XEER-NIDAAMIYAHA

Xeer-nidaamiyahan waxaa u xilsaaran fulintiisa Wasaaradda Batroolka & Macdanta Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

QODOBKA 15AAD:
WAX KA-BEDELKA XEER-NIDAAMIYAHA

Xeer-nidaamiyahaan waxaa wax looga beddeli karaa iyadoo la raacaayo nidaamka wax ka bedelidda xeerarka iyo xeer-nidaamiyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

QODOBKA 16AAD:
XOOJINTA SHARUUC IYO XEERAR HORE

Xeer nidaamiyahaan waxaa lagu dhaqangalinayaa si wafaaqsan Sharciga Batroolka ee 2020 ee JFS, iyo Sharci 42 ee 1da Disember 1973 ee Wakaalada Batroolka Soomaaliyeed si loo maareeyo hawlaha dareer-hoosaadka shidaalka iyo gaaska.

QODOBKA 17AAD:
DHAQANGALKA XEERNIDAAMIYAHAAN

Xeer nidaamiyahaan wuxuu dhaqan-galayaa taariikhdaay ansixiyaan Golaha Wasiiradda. Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

JADWALKA KOWAAD: RUQSADAHA SHIDAALKA EE SANNADKIIBA

SN	Hawlaha Ganacsiga batroolka iyo Gaaska Diyaaradaha Jet-A-1	Khidmada batroolka iyo Gaaska Diyaaradaha Jet-A-1 (USD)	Khidmada cusbooneynsiinta batroolka iyo Gaaska Diyaaradaha Jet-A-1 (USD)	Khidmada Gaska Cuntada	Cusbooneysiinta Gaska Cuntada
1.	Keenista. Kaydinta iyo Daabulida.	1,000.00	500.00	500	200.00
2.	Ganacsiga Kaalimaha Shidaalka	500.00	500.00	200	100

JADWALKA LABAAD:KHIDMADA BIXINTA SHAYBAARKA

Sn	Nooca Shidaalka	Qiimaha (USD per Metric Ton and metric Cube)
1	GasOil (Diesel)	Inspection Analysis and fuel Marking Charges 20 USD /per Metric Cube
2	Gasoline (Patrol)	Inspection Analysis and fuel Marking Charges 20 USD /per Metric Cube
3	Jet A1	Inspection Charges 0.95 / USD /per Metric ton *MT and Analysis Charges 0.060/USD /MT
4	Lubricants greases	Inspection Charges 0.95 / USD /per Metric ton *MT and Analysis Charges 0.060/USD /MT

JADWALKA 3AAD: KHIDMADA GANAAXA RUQSAD KALA NOQOSHADA

SN	NOOCA SHIRKADA	QIIMAHA
1	Soo dejinta,Kaydinta iyo Daabulida shidaalka caamka ah sida Naaftada iyo Baasiinka iyo Gaaska diyaaradaha JET A-1	$500.00
2	Soo dejinta,Kaydinta iyo Daabulida shidaalka caamka ah Gaaska Cuntada	$100
3	Kaalimaha Gaska Cuntada	$200
4	Kaalimaha Shidaalka	$500

JADWALKA 4AAD: HALBEEGGA BARIGA AFRIKA EE SHIDAALKA IYO SOOMAALIYA

[Somalia, Kenya, Uganda, Tanzania, Rwanda iyo Burundi]

Gaasoliin ama Batrol - Premium motor spirit (unleaded)	
Halbeegga (Parameter)	Xuduudda (Limits)
RON [Research octane number]	Ugu yaraan 93
MON [Motor octane number]	Ugu yaraan 83
Wadarta Salfarka) - Sulphur content	Ugu badnaan 15 ppm
Cufnaanta @ barta heerkulka 15 °C	720 - 780 g/ml
Lead inta ku jirta	Ugu badnaan 0.013 g/L
Benzene inta ku jirta	Ugu badnaan 3% v/v
Diisel (Diesel)	
cadada cetane ka (Cetane number)	Ugu yaraan 51
Tusmada Cetane ka (Cetane Index)	Ugu yaraan 48
Wadarta Salfar (Total Sulphur Content)	Ugu badnaan 50 ppm
Barta heerkulka holaca (Flashpoint)	Ugu yaraan 66 °C
Cufnaanta @ 15 °C	820 -870 kg/m³

Taariikh: 30/03/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 121

XEERKA XEER NIDAAMIYAHA HAY'ADDA BATROOLKA SOOMAALIYEED

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuuka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **WBM/XW/GB/0029/2023** oo ku taariikheysan **08/03/2023**,kuna saabsan codsi Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/03/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo in la meel-mariyo **Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.**

Wuxuu Xeeriyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/02/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2aad

Waxaa Waasaradda Batroolka iyo Macdanta loo igmaday fulinta iyo meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Xeerka Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Wasaaradda Batroolka Iyo Macdanta

Xeer-Nidaamiyaha Hay’adda Batroolka Soomaaliyeed (H.B.S)

Lagu Soo Saaray Si Waafaqsan Sharci Lr. 19 Soo Baxay 08 Febaraayo 2020

Ansixiyeen Golaha Wasiiradda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

March 2023 .

Xeer Gole Wasiir

Xeer-nidaamiyaha Hey'adda Batroolka Soomaaliya Lr. Xx soo baxay xx Diseembar 2022

Qodobka 1aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabayaa Xeer-nidaamiyaha Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed, wuxuuna dhaqangalayaa markii uu meelmariyo Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad: Ereybixin

Erayada soo socda waxay yeelanayaan micnaha mid walba ku hor qoran haddii aysan ka hor imaanayn micnaha lagu siiyay Sharciga Batroolka:

1. **H.B.S**
   Waxaa loola jeeda Hay'adda Batroolka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee lagu dhisay Qodobka 19aad ee Sharci Lr. 19 ee soo baxay 08 Febaraayo 2020.
2. **Xeer-nidaamiye**
   Waxaa loo la jeedaa Xeer-nidaamiyaha H.B.S
3. **Habraacyada caalamiga ee Wanaagsan:**
   Waxaa loola jeedaa hab-dhaqanka ugu wanaagsan marka lagu gudajiro hawlaha batroolka, kaas oo si guud loo gartay in uu wanaagsanyahay, dhawrayo badqabka, hufnaanta iyo hab-sami u socodka shaqada intaba, sidoo kalana lagu dabaqi karo heer caalami marka la helo xaalado ku haboon
4. **Guddi:**
   Waxaa loola jeedaa Guddiga Maamulka H.B.S ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
5. **Guddoomiye:**
   Waxaa loola jeedaa guddoomiyaha Guddiga ahna Maareeyaha Guud ee H.B.S.
6. **Wasiir:**
   Waxaa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
7. **Wasaaradda:**
8. **Horumarin:**
9. **Goob:**
10. **Rukhsadle Idman**
11. **Batrool:**

Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.

Waxaa loola jeedaa qorshaynta, bud-dhigga, dhisidda iyo samaynta goobo aan looga maarmayn soo saarista batroolka.

Waxaa loola jeedaa:

i. Dhisme kasta, qalab ama kaabe sida: dhuumaha, xarumaha koontroolka dhuumaha, xarumaha bamka iyo cadaadintooda ama qalabka kasta oo loo isticmaalo si loo fuliyo hawlaha batroolka la xiriira;
ii. Noocyada kala duwan gaadiidka badda ee loo isticmaalo qodidda ama taageerada hawlaha batroolka ee socda; iyo
iii. Noocyada kala duwan gaadiidka badda ee loo adeegsado xamuulka jumlada ah ee batroolka markii lagu xiriiriyo goob raridda batroolka loogu talagalay.

Waxaa loola jeeda rukhsadle ama shirkad kasta oo mas'uul uga ah rukhsadle ama tiro rukhsadlayaal ah maaraynta shaqa maalmeedka hawlaha batroolka.

Waxaa loola jeedaa:

i. Hydrocarbon kasta oo iskiis u samaysmay, ha lahaado qaab gaas, dareere ama adke;
ii. Isku jir kasta oo hydrocarbon ah oo iskiis u samaysmay, ha la haado qaab gaas, dareere ama adke, kaas oo laga soo saaray harooyinka caadiga ah ama kuwa aan caadi ahayn.

12 **Wax soosaar:**

13 **Sanduuqa dhexe:**

Waxaa loola jeedaa hawlaha la xiriira shidaalka iyo gaaska laga soo saaro harooyinka iyo in daabulis loo diyaariyo taas oo looga rarayo ceelka shidaalka loona rarayo barta xamuulka.

Waxaa loola jeedaa koontada uu ku dhacayo dhamaan dakhliga ka soo xarooda fulinta hawlaha batroolka

Qodobka 3aad: Shakhsiyadda Qaanuuneed ee H.B.S

1. H.B.S waxey yeelaneysaa shakhsiyad iyo jiritaan qaanuuneed iyo shaabbad rasmi ah, waxayna awood u leedahay inta ay ku gudajirto gudashada hawleheeda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan:

   I. Lahaanshaha, gacan ku haynta, bixinta hantida guurto iyo maguurto intaba; II. Inay wax dacwayso laguna dacweeyo shakhsiyaddeeda qaanuuniga ah; iyo III. Fulinta dhamaan hawlaha uu sharciga u banaynayo shakhsiyaadka qaanuuniga ah.

Qodobka 4aad: Xarunta iyo xafiis-goboleedka H.B.S

1. Xafiiska dhexe ee Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waa Muqdisho, magaalo- madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Xafiis Goboleedka H.B.S waxaa loo dhisayaa, laguna dhaqayaa isla markaasina xilkiisa u gudanayaa si waafaqsan Qodobka 19aadee Sharciga Batroolka.
3. Furista iyo ka howlgalka Xafiis Goboleed waxaa hagaya siyaasada dowladda iyadoo la tixgelinayo baahiyaha markaas taagan, waxaana Go'aaminayo Wasiirka Wasaarada, ka dib marka uu la tashi la sameeyo H.B.S

Qodobka 5aad: Hawlaha H.B.S

H.B.S waxay qabanaysaa:

i. Ilaalinta danaha qaranka ee ku aaddan baarista, horumarinta iyo soo saarista batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

ii. Dib-u-eegista iyo uga talobixinta Wasiirka arrimaha ku saabsan meel- marinta, wax ka bedelka iyo diidmada ee ku aaddan: qorshayaasha, codsiyada, warbixinnada, gorfeynta xogaha iyo macluumaad kasta oo uu soo gudbiyo codsade ama rukhsadle kuwaas oo ku saabsan bixin ama cusbooneysiin rukhsad sahmin ama soo saaris batrool;

iii. Fulinta tartanka furan ee ku saabsan bixinta heshiisyada wax soosaar wadaagga marka uu Wasiirka wareegto oggolaansho ku soo saaro;

iv. Kormeerka iyo xaqiijinta u hoggaansamidda siyaasadaha qaran, xeerarka, xeer-nidaamiyeyaasha iyo heshiisyada la xiriira hawlaha batroolka;

v. Xaqiijinta in qandaraasleyaasha, qandraasle-hoosaadyadooda iyo qof kasta oo ku lug leh hawlaha batroolka ay u hoggaansan yihiin shuruucda iyo xeer-nidaamiyeyaalka dhaqangalka ku ah;

vi. Xaqiijinta u hoggaansamidda siyaasadaha, shuruucda, xeerarka, heshiisyada iyo halbeegyada caafimaad, kuwa badqab iyo kuwa deegaan ee hawlgallada batroolka iyadoo la kaashanayo hay'adaha dowladeed ee khuseyso;

vii. Xaqiijinta u hogaansamidda waajibaadka la xiriira cabbirka maaliyadeed inta lagu guda jiro soo saaristas batroolka si waafaqsan shuruucda dhaqan galka ah;

viii. Korjoogteynta iyo nidaaminta hawlaha batroolka, oo ay ka mid tahay qiyaasta kaydka, cabirka mugga shidaalka iyo gaaska la soo saaro, iyo fulinta dhamaan dabagallada iyo baaritaannada qaybta ka ah hawlaha H.B.S ee ku xusan xeerarka dhaqangalka ku ah;

ix. Xaqiijinta in hawlaha batroolka ay yihiin kuwo leh qorshooyin iyo dhaqaale ku salaysan qiimayn jaango'an kuwaas oo horseedi kara in batroolka loo soo saaro sida ugu waxtar badan;

x. Dhiirragelinta iyo horumarinta ka qeybgalka dadka Soomaaliyeed ee ku aaddan adeegyada hawlaha batroolka.

xi. Xaqiijinta dhismaha kaydka qaran ee xogaha batroolka, oo ay qayb ka yihiin kaydka dhexe ee xogta rukhsadlayaasha iyo dhamaan shakhsiyaadka ku lugta leh hawlaha batroolka, maaraynta xogta batroolka iyo diyaarinta warbixinno joogta ah iyo qoraallo daabacan oo ku saabsan hadba meesha ay marayaan hawlaha batroolka.

xii. Xaqiijinta iyo uga tala bixinta Wasiirka arrimaha ku saabsan meel-marinta, wax ka beddelka iyo diidmada codsiyada hawlaha sahan ee ku xusan qorshe- hawleedka sanadlaha ah, qorshaha sahan iyo adoroska wax soo saar, iyo dib u eegista iyo meel marinta miisaaniyadda ee uu soo gudbiyo rukhsadlaha;

xiii. Oggolaanshaha Wasiirka kadib, gelidda wadaxaajoodyada ku saabsan bixinta, wax ka beddelida, cusbooneysiinta, muddo kordhinta iyo ka bixidda heshiisyada batroolka;

xiv. Xaqiijinta iyo uga talo bixinta Wasiirka warbixinnada helitaanka batrool ee uu soo gudbiyo rukhsadle;

xv. Hubinta qalabka loo adeegsanayo cabirka maaliyadeed ee batroolka la soo saaro iyo bixinta oggolaanshaha adeegsigiisa;

xv. Ka qaybgalka iyo ansixinta cabbirka batroolka si go'aan looga gaaro royaltiga, faa'idada batroolka ama gaaska oo ay yeelanayso Dawladda;

xvi. Qiimaynta, hubinta iyo bixinta oggolaanshiyaha shidaalka ama gaaska kharash ahaan ay u qaadanayaan rukhsadlayaasha;

xvii. Siinta xogta muhiimadda u leh hay'adaha Dawladda u xilsaaran ururinta canshuuraha, khidmadaha iyo royaltiga la xiriira hawlaha batroolka;

xviii. Xaqiijinta iyo fududeynta jiritaanka tartan furan oo u dhaxeeya dhinacyada saddaxaad kuwaas oo ku beratamaya in ay adeegsadaan ama ka faa'iidaystaan kaabeyaasha iyo goobaha u dhisan in lagu fuliyo howlaha batroolka;

xix. Korjoogteynta xaaladaha shaqo iyo howl-fulineed ee Rukhsadlaha Idman si loo xaqiijiyo jiritaan tartan xalaal ah oo hufan kuna aaddan fulinta howlaha batroolka;

xx. Qiimaynta heerka gebagabo ee wax soo saarka batrool iyo hakinta hawlaha batroolka iyo qorshayaasha dib-u-furfuridda agabka iyo xarumaha batroolka;

xxi. Samaynta cilmi baaris ku aaddan hababka ugu haboon ee lagu sahamin karo, loo soo saari karo, loogana faa'iideysan karo batroolka iyo walxaha laga sameeyo ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

xxii. Fulinta hawl kasta oo uu igmado ama ka dalbado Wasiirka taas oo loo arko in ay la xiriirto ama ka dhalanayso hawlaheeda ku xusan Xeer- nidaamiyahan;

xxiii. Markii ay gudanayso hawleheeda, mas'uuliyaddeeda iyo waajibaadkeeda, H.B.S waxay la tashanaysaa wada shaqayn dhawna la yeelanaysaa Wasiirka iyo howlwadeennada Wasaaradda. Sidoo kale, H.B.S waa in ay wadashaqeyn la yeelataa wasaaradaha, Waaxyaha iyo wakaaladaha kuwaas oo waajibaadkooda, yoolalkooda iyo shaqadooda ay xiriir la leedahay H.B.S .

xxiv. H.B.S waxaa masuul ka tahay:

i. fulinta shuruudaha heshiisyada iyo rukhsadaha ku saabsan sahminta iyo soosaarista batroolka ee lagu galay ama lagu bixiyay si waafaqsan Sharciga Batroolka;

ii. Kala shaqeynta hey'adaha dowlada Federaalka Soomaaliya arrimaha ku saabsan Arurinta iyo soo xaraynta dhamaan lacaga kirada, royaltiga khidmadaha, ganaaxyada, canshuuraha iyo lacagaha kale ee ka dhasha heshiisyada shidaalka iyo dakhliga kale.

Qodobka 6aad: Awoodaha H.B.S

H.B.S waxay awood u leedahay:

1. bixinta ogolaanshiyaha howlgelidda sahanka horudhaca ah ee xirmo heshiis wax soo saar wadaagga iyadoo fulinaysa faritaanada iyo siyaasadda uu jaangooyey Wasiirka ee ku aaddan baaris aag uu Wasiirku cayimay Si waafaqsan qodobka 23aad ee Sharciga Batroolka;
2. Ka dib ogolaanshaha Wasiirka, gelidda wadaxaajoodyada heshiisyada wax soo saar Wadaagga si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa;
3. Bixinta ogolaanshiyaha isticmaalka dhuleed si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa;
4. Ka dib ogolaanshaha Wasiirka, ka qaadista qof rukhsadle ah culaysyo gaar ah oo uu la kulmo si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa;
5. Ka dib oggolaanshaha Wasiirka, wax ka bedelka iyo kala noqoshada rukhsad kasta si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa iyo shuruudaha rukhsadda;
6. Bixinta iyo dhaqan galinta tilmaamo lagu xaqiijinayo u hogaansamidda rukhsadda;
7. Uga tala bixinta Wasiirka arrin kasta oo la xiriira taabbagelinta, kormeerka, nidaaminta, sahanka, horumarinta iyo soo saarista batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya taasoo ku sallaysan hannaan sugan oo badqaba wax ku oolna ah isla markaana ilaalinaya badqabka deegaanka;
8. soojeedinta hageyaal iyo habraacyo jideynaya habbabka ugu habboon ee ugu bedqabsan ee lagu sahminayo, horumarinayo, soosaarayo loogana faa'iidaysanayo batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyadoo la ilaalinayo wanaagsanaanta iyo bedqabka deegaanka; iyo
9. Fulinta howlaha iyo faritaanada uga yimaada Wasiirka sida ku cad qodobka 11aad.

Qodobka 7aad: Heshiisyada Sahminta Batroolka

Gelidda heshiisyada ku saabsan sahminta batroolka waxaa la waafajinayaa tallaabooyinka soo socda:

1. Wasiirku ayaa soo gaaraya go'aanka ah in la sameeyo Sahmin aag isagoo tixgelinayo siyaasadda xukuumadda iyo siyaasadda Wasaaradda ee ku aaddan horumarinta iyo ka faa'idaysiga Khayraadka ku jira barriga iyo badda hoosteeda

2. Wasiirku wuxuu magacaabayaa guddi khubarro oo gelaya wadaxaajoodyada ku aaddan heshiiska sahminta batroolka. Guddiga khubarrada ayaa u gelaya wadaxaajoodyada si waafaqsan Sharciga Batroolka, Xeer nidaamiyeyaalka iyo siyaasadda Xukuumadda ee ku aaddan helidda xogaha cilmiyaysan ee lagu xaqiiqsanayo jiritaanka batrool ku kaydsanaan kara geyiga Soomaaliya.

3. Wasiirku, Kaddib marka uu ka baaraandego in qodobbada heshiisku waafaqsan yihiin Sharciga Batroolka, Xeer nidaamiyeyaalka iyo siyaasadda Xukuumadda ee ku aaddan horumarinta howlaha batroolka, wuxuu saxiixayaa heshiiska sahminta batroolka.

Qodobka 8aad: Wadaxaajoodka tooska ah ee heshiisyada wax soosaar wadaagga

H.B.S waxay raaceysaa habraaca soo socda marka ay galeyso wadaxaajoodka tooska ah ee ku saabsan Heshiisyada Wadaagga Wax Soo Saarka:

1. Wasiirka, isagoo fulinaya siyaasadda Xukuumadda, wuxuu farayaa H.B.S in ay gorgortan ama wadahadal la gasho shirkad ama shirkado ay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya u aragto in dan qaran ku jirto.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimmeyn kaalinta hoggaamineed ee H.B.S ee ku aaddan wadaxaajoodka, Wasiirka wuxuu magacaabayaa khubarro iyo xeeldheerayaal aqoon iyo khibrad gaar ah u leh arrimaha ka faa'iideysiga batroolka si ay uga qeybgalaan wadaxaajoodka.
3. Marka ay H.B.S soo gunaanado gorgortanka ku aaddan Heshiiska Wadaagga Wax Soosaarka waxa ay u gudbineysaa Wasiirka nuqulka rasmiga ah muddo todobo maalmo shaqo gudahood.

Qodobka 9aad: Habraaca tartanka furan ee bixinta heshiisyada wadaagga wax soosaar

Marka la fulinayo howlaha tartanka furan ee Heshiisyada Wadaagga Wax Soosaarka ee ku sheegan qodobka 26aad ee Sharciga Batroolka, waxaa waajib ah in la raaco tallaabooyinka soo socda:

1. Wasiirka, isagoo fulinaya siyaasadda Xukuumadda isla markaana tixgelinaya soojeedinta H.B.S , wuxuu go'aan ka gaarayaa xilliga ugu habboon fulinta howlaha tartanka furan ee bixinta Heshiiska Wadaagga Wax Soo Saarka.
2. Wasaaradda ayaa mas'uul ka ah maareynta arrimaha siyaasadeed iyo midda korjoogteeneed ee ku xeeran fulinta howlaha tartanka furan, halka H.B.S ay u xilsaarnaaneyso arrimaha farsamo ee fulinta tartanka furan.

   3. Iyadoo aan waxba loo dhimmeyn kaalinta hoggaamineed ee H.B.S ee ku aaddan wadaxaajoodka inta lagu gudajiro tartanka furan, Wasiirka wuxuu magacaabayaa khubarro iyo xeeldheerayaal aqoon iyo khibrad gaar ah u leh arrimaha la xiriira sida loo maareeyo tartan furan si ay uga qeybgalaan wadaxaajoodka tartan furan.
4. Marka ay H.B.S soo gunaanado gorgortanka ku aaddan Heshiiska Wax Soo Saarka Wadaagga, waxa ay u gudbineysaa Wasiirka nuqulka rasmiga ah muddo soddon maalmo shaqo gudahood.

Qodobka 10aad: Hab-dhaqanka shaqo ee H.B.S

1. H.B.S waxay hawleheeda iyo waajibaadkeeda u gudanaysaa, awoodeheedana u dhaqangalinaysaa si:
    i. Waafaqsan Sharciga Batroolka, siyaasaddaha iyo xeer-nidaamiyeyaalka lagu fulinayo Sharciga Batroolka oo ay dejiso Xukuumadda;
    ii. Hufan oo maangal ah;
    iii. Cadaalad ah isla markaana macquul ah;
    iv. Aan eex lahayn;
    v. Ku salaysan tartan xalaal ah.
2. Iyadoo aan wax loo dhimayn saamaynta guud ee faqradda kore ee Qodobkaan, H.B.S markii ay xilkeeda gudanayso waxay:
    i. Ku korjoogtaynaysa rukshadleyaasha shaqowanaagga, dhaqaalaynta hantida iyo khayraadka, badqabka deegaanka iyo noolaha inta ay ku gudajiraan hawlaha batroolka;
    ii. Xaqiijinta in rukhsadlayaasha ay fuliyaan hawlaha batroolka ee lagu siiyay rukhsadda;
    iii. Horumarinaysaa tartanka loo galayo hawlaha batroolka;
    iv. Xaqiijinaysaa hufnaanta la xiriirta hawlaha batroolka iyo H.B.S;
    v. U dhawraysaa habraacyada maaliyadeed oo ay dhigayaan Shuruucda dalka.

Qodobka 11aad: Sugidda Shaabbadda H.B.S

1. Shaabadda rasmiga ah ee H.B.S waxay noqonaysaa qaabka ay go'aamiso H.B.S isla markaana uu meelmariyo Wasiirka, waxaana gacanta ku haynaya Gudoomiyaha (Maareeyaha Guud) waxaana lagu suntayaa qoraallada rasmiga ah ee H.B.S
2. Guddoomiyaha H.B.S iyo Xoghayaha Guud ayaa mas'uul ka noqonaya gacan ku heynta Shaabadda H.B.S iyo adeegsiga Shaabadda.

Qodobka 12aad: Awoodda hagitaan iyo korjoogteyn ee Wasiirka ku leeyahay H.B.S

Wasiirku wuxuu ku hagayaa H.B.S:

1. Si waafaqsan qodobka 19 (1) ee sharciga Batroolka, HBS waa Hay'ad ka tirsan wasaaradda Batroolka kuna shaqaysa siyaasadda, istraatejiyada iyo qorshaha wasiirka, si loo hormariyo loogana faa'idaysto soo saarka batroolka iyo gaaska.
2. Waxuu ku hagayaa wixii ku aaddan siyaasado, shuruuc, xeer-nidaamiyeyaal iyo qorshe kasta oo ay tahay in la dhawro ayna fuliso H.B.S intii ay ku jirto gudashada xilkeeda.
3. Diyaarinta iyo hirgelinta siyaasadaha lagu maaraynayo qaab-dhismeedka hey'adda, shaqaalaha iyo shuruudaha shaqada, diyaarinta qalabka iyo adeegsiga miisaaniyadda loo qoondeeyay.

4. Diyaarinta iyo fulinta siyaasadaha, qorsheyaalka iyo meelmarinta miisaaniyadda ku saabsan dhisidda karaanka iyo kobcinta awoodda hey'adeed ee HBS ;
5. Fulinta tabbabaro, aqoon-kororsi iyo samaynta cilmi baaris la xiriira howlaha H.B.S.
6. Diyaarinta iyo dib-u-eegista miisaaniyad sanadeedka H.B.S taasi oo loo gudbinayo Wasiirka;.
7. Diyaarinta iyo u gudbinta Wasiirka warbixinno tifaftiran oo ku saabsan maaraynta miisaaniyadda;
8. Soo gudbinta warbixinno, xogwarran iyo odoros xilliyeysan kuwaas oo ku saabsan howlaha H.B.S hadba sida Wasiirka faro;
9. Soo gudbinta caddaymo lagu xaqiijin karo warbixinnada, xogaha iyo odoroska H.B.S ay la wadaagto Wasiirka;
10. Maaraynta hantida H.B.S iyo dakhliga ka xarooda si waafaqsan shuruucda dalku leeyahay.

Qodobka 13aad: Hagitaanka H.B.S ee Rukhsadlaha iyo u hoggaansamiddooda

1. H.B.S waxay, wargalin qoraal ah oo la gaarsiiyo rukhsadlaha, ku siin kartaa hagitaanno ama faritaanno waafaqsan xeerka dhaqangalka ah iyo hab-raacyada caalamiga ah ee ugu wanaagsan si loo xaqiijiyo in sida ugu habboon loo soo saaro batroolka laguna dhiirigeliyo in hawlagallada ka socda goobaha rukhsadaha lagu bixiyay ay noqdaan kuwo deegaanka iyo noolaha ilaalinaya.
2. Rukhsadlaha waa inuu u hoggaansamaa faritaannada ay soo saarto H.B.S si waafaqsan qodobka 12.1. Cabasho ku saabsan faritaanada, go'aannada iyo amarradaH.B.S waxaa loo qaadan karaa Maxkamadda Sare ee dalka si waafaqsan Qodobka 19aad(22) ee Sharciga Batroolka.

3. Haddii uu rukhsadluhu ku guuldaraysto ama uu dayaco u hoggaansamidda faritaannada xilliga ku jaango'an wargalinta kusoo baxday si waafaqsan qodobka 12.1, H.B.S waxay ku dhaqaaqi kartaa dhamaan ama qaar ka mid ah ku cad qoraalka wargelinta.

4. Kharashaadka ka dhasha qodobka 12aad waa qaan ay leedahay Dowladda tahayna in loo shubo Khasnadda Dawladda, waxaana lagu qaadi karaa dacwad la horgeeyo maxkamadda awoodda u leh, iyadoo aan wax loo dhimaynin suurtagalnimada in rukhsadlaha lagu xukumo fall sharci darro ah si waafaqsan Shuruucda dalku leeyahay.

Qodobka 14aad: Guddiga Maamulka ee H.B.S

1. Guddiga Maamulka H.B.S wuxuu ka koobnaanayaa laba xubnood oo matalaya Dawladda Federaalka, iyo min hal xubin oo kala matalaya mid kasta ka mid ah Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka, kuwa jira iyo kuwa samaysmi doona (xilligii ay samaysmaan) iyo Gobolka Banaadir.
2. Xubnaha Guddiga Maamulka H.B.S waxaa lagu xulanayaa aqoon, shaqa- wanaag, karti iyo hufnaan.
3. Dowlad Goboleed kasta iyo Gobolka Benaadir waxay u soo gudbinayaan Wasiirka magacyada labo (2) musharrax. Wasiirku wuxuu u gudbinayaa Golaha Wasiirada si loo ansixiyo xubnaha soo buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 19aad(3)(5) ee Sharciga Batroolka.
4. Muddo-xilleedka Guddiga, waa afar (4) sano. Golaha Wasiiradda waxay xilka ka qaadi karaa xubin ama xubnaha Guddiga xilli kasta si waafaqsan Sharciga Batroolka marka uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
5. Golaha Wasiiradda, oo ku salaynaya soojeedinta Wasiirka, ayaa magacaabaya Guddoomiyaha iyo Gudoomiye Ku-xigeenka Guddiga Maamulka H.B.S.
6. Qofka loo magacaabo Gudoomiyaha Guddiga H.B.S ayaa noqonaya Maareeyaha Guud ee H.B.S. Maareeyaha Guud wuxuu awood korjoogtayn iyo mid maamul ku yeelanayaa shaqaalaha H.B.S iyo shaqadooda. Haddii uu maqnaado Gudoomiyaha ama ay jagadiisa bannaanaato Gudoomiye Ku-xigeenka ayaa yeelanaya dhamaan awoodaha Gudoomiyaha.
7. Buuxinta boosaska bannaan ee Guddiga waxaa loo raacayaa habraacyada ku xusan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyahan.
8. Guddiga wuxuu masuul ka noqonayaa, iyadoo Wasiirkuna ku korjoogteenayo, fulinta siyaasadda, hawlaha iyo waajibaadka Guddiga iyo faritaanno kasto ama hawl kasta ee uu u igmado Wasiirka si waafaqsan Sharciga Batroolka.

Qodobka 15aad: Howlaha iyo waajibaadka Guddiga

1. Guddigu wuxuu kormeerayaa, korjoogteyn ku sameeynayaa Maareeyaha Guud iyo howlwadeennada Hey'adda si ay u hubiyaan gudashada waajibaadka shaqo ee hay'adda u xilsaartay si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa.
2. Si waafaqsan faqrada (1) aad, Guddiga wuxuu :
    a. Dib-u-eegista iyo uga talabixinta Wasiirka qorsheyaalka iyo barnaamijyada lagu fulinayo soosaari batrool uuna soo gudbiyo rukhsadle si loo meelmariyo;
    b. Ansixinayaa qorsheyaalka, barnaamijyada iyo miisaaniyadda H.B.S ee lagu fulinayo howlaha iyo waajibaadka H.B.S una gudbinayaa Wasiirka si uu meelmariyo;

c. Dejinta xeerhoosaadka hagaya ama lagu maarayno fadhiyada iyo hannaanka go'aan gaarista guddiga iyo arrimaha kale ee lagama maarmaanka u ah habsami u socodka howlahooda. Guddiga wuxuu u gudbinayaa xeerhoosaadkiisa Wasiirka.

d. kormeerayaa iyo dib u eegisna ku samaynayaa hawlaha iyo waxqabadka Maareeyaha Guud iyo howlwadeennada Hey'adda, ka dib marka aay xiriir la sameeyaan Maareeyaha Guud ama Xoghayaha Guud ee HBS kuna wargeliyaan kormeerkooda

e. korjoogtaynayaa habka maaraynta miisaaniyadda H.B.S;

f. dejinayaa iyo ansixinayaa qaab-dhismeedka Hey'adda iyo siyaasadaha lagu maaraynayo shaqaalaha iyo shaqada una gudbinayaa Wasiirka si uu meelmariyo;

g. Uga talabixinayaa Wasiirka arrimaha ku saabsan horumarinta batroolka Soomaaliya;

h. Guddiga wuxuu u soojeedin karaa Wasiirka shaqo ka joojin Guddoomiyaha. Soojeedinta Guddiga waa in ay ku saxiixan yihiin lix (6) xubnood isla markaasina soojeedintooda ku salaysan tahay sababaha soo socda:

    a. Ku xadgudbidda awoodda xafiiska;
    b. Wadashaqayn xumo carqaladaynaysa habsami u socodka howlaha H.B.S;
    c. Awood la'aanta qabashada shaqooyinka xafiiskiisa taasi oo ay sababtay caafimaad darro xagga jirka ama maskaxda ah;
    d. anshaxdarro iyo habdhaqan aan ku habboonayn xilgudashadiis; iyo
    e. xilgudasho la'aan.

3. Fulinta hawlaha kale ee uu u xilsaaro Wasiirka

Qodobka 16aad: Shuruudaha xubinnimada Guddiga

1. Shakhsi uma qalmo in loo magacaabo ama uu sii ahaado xubin ka mid ah H.B.S haddii:

    i. Uusan ahayn muwaadin Soomaaliyeed ama yahay: milkiile, saamile, maamule, sarkaal, wadaage, ama uu ku lug leeyahay ganacsiga soo saarista, iibinta, gadidda, daabulidda, dhoofinta, soo dhoofsashada ama ka ganacsiga batroolka gudaha Soomaaliya ama leeyahay gacan ku haynta kaambiyaale, saami dayn ama saamiga shirkad ku guda jirto ganacsi noocaas ah.

    ii. Maxkamad ku caddeysay dambi uu qayb ka yahay isdabamarin ama khiyaano ku ridday xukuna kama dambeys ah.

    iii. Uu yahay mid musalafay oo aan dayn bixi karin.

iv. Qofkii aqbalaa magacaabista loo magacaabo xubinnimada Guddiga ama guta xilka xubin ka mid ah Guddiga isagoo og in mid ama in ka badan xaaladaha ku xusan qodobka 14aad ay ku dabaqmayaan wuxuu galay fal dambiyeed.

v. Qofku wuxuu galayaa dambi haddii isagoo xubin ka ah Guddiga ama uu ku sii jiro sii gudashada xilka xubinnimo uu helo, ama gacanta ku dhigo, si ugu jirta faa'ido toos ah ama mid dadban, isagoo u maraya qandaraas ama hab kale:

   a. Saamiyo ama faa'ido uu ku yeelanayo shirkad ka hawlgasha ama adeeg ka fulisa batroolka; ama

   b. Awoodda gacan ku haynta go'aannada guddiga ama maamulka rukhsadle.

Qodobka 17aad: Xilwaayidda iyo shaqo ka joojinta xubnaha Guddiga

1. Xubinnimada Guddiga waxaa lagu waayi karaa**:**

   i. geeri;

   ii. Istiqaalo qoraal ah oo uu gudbiyo Wasiirka;

   iii. Xil gudasho la'aan ka dhalata xaalad caafimaad darro;

   iv. xil-ka-qaadis ay Golaha Wasiiradda ku sameeyaan taasi oo ku salaysan soojeedinta Wasiirka;

   v. ku xadagudbidda Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa;

   vi. Haddii ay maxkamad ku riddo xukun ciqaab xabsi ah oo kama dambays ah;

2. Wasiirka wuxuu shaqo ka joojin ku sameyn karaa xubin ka tirsan Guddiga Maamulka:
    i. Haddii xog wadata caddaymo ku filan lana xiriirta hab-dhaqanka xubintaas la horkeeno Wasiirka taas oo horjoogsan lahayd magacaabistiisa haddii uu ka war qabi lahaa Wasiirka;
    ii. Haddii ay si joogto ah u carqaladaysa habsami u socodka shaqada H.B.S;
    iii. Xil gudasho la'aan darteed;
    iv. Wadashaqeyn xumo daran;
    v. Ka maqnaanshiyaha toban (10) fadhi oo isku xiga fadhiyada Guddiga cudurdaar la'aan;
    vii. In ay musalafto.
    viii. Haddii xubin guddiga ka mid ah bixiso xogaha HBS, ama suuqyada la geeyo xogaha iyo howlaha HBS
    ix. Haddii xubin guddiga maamulka HBS ah xiriir la sameeyo shirkad ama shirkado heshiis lala galay ama wadahadal wax soo saar wadaag ah kula jirta Wasaaradda ama HBS, iyadoo aan loo idman.

Qodobka 18aad: Xuquuqda maaliyadeed ee xubnaha Guddiga

Guddoomiyaha iyo xubnaha Guddiga waxay yeelanayaan xuquuq uu jaan-goynayo Wasiirka.

Qodobka 19aad: Xilka Guddoomiyaha ahna Maareeyha Guud ee H.B.S

Guddoomiyaha, ahna Maareeyaha Guud ee H.B.S, waa sarkaalka fulineed ee ugu sarreeya maamulka H.B.S. Guddoomiyuhu wuxuu u xilsaaran yahay:

i. Diyaarinta iyo fulinta siyaasadaha, qorshayaasha iyo barnaamijyada H.B.S iyo wasaaradda;
ii. U gudbinta Guddiga siyaasadaha, qorsheyaasha iyo barnaamijyada H.B.S. si uu u ansixiyo, ka dibna loogu gudbiyo Wasiirka.
iii. Siin Guddiga warbixinno joogta ah oo ku saabsan fulinta siyaasadaham barnaamijyada iyo qorsheyaalka H.B.S.;
iv. Socodsiinta iyo maareynta howl-maalmeedka H.B.S;
v. Magacaabista, maamulka iyo korjoogtaynta shaqaalaha H.B.S si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka iyo xeer-nidaamiyeyaalkiisa isagoo la tashanayo wasiirka wasaaradda.
vi. Matelaadda Guddiga iyo H.B.S;
vii. Guddoominta fadhiyada iyo kulamada Guddiga;
viii. Wada shaqayn la yeelanayaa hay'adaha hormuudka ka ah hawlaha la xiriira batroolka;
ix. Ka talabixinta arrimaha hoos imanaya masuuliyadda H.B.S hadba markii loo baahdo; iyo
x. Fulinta waajibaadkiisa si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa.

Qodobka 120aad: Xilwaayidda Guddoomiyaha

Guddoomiyuhu, ahna Maareeyaha Guud, wuxuu xilkiisa ku waayi karaa si waafaqsan Qodobka 19(3)(3) ee Sharciga Batroolka iyo Qodobka 16aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

Qodobka 21aad: Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha H.B.S

Hawlwadeennada iyo shaqaalaha H.B.S waxaa lagu dhaqayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Federaalka Soomaaliya. Maamulka shaqaalaha qaybaha iyo howl maalmeedka H.B.S waxaa masuul ka ah Xoghayaha Guud, waxaan ku korjoogteeynaayo Maareeyaha Guud

Qodobka 22aad: Ilaalinta siraha iyo xogaha H.B.S

1. Iyada oo lagu salaynayo Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ku dabaqmaya, qof xubin ka ah Guddiga ama xubin ka tirsan shaqaalaha H.B.S waa in uusan faafin xog kasta oo uu helay muddadii uu shaqaynayay.
2. Qofka ka baxa xubinnimada Guddiga ama xubin ka tirsan shaqaalaha H.B.S waa in uusan faafin xog kasta oo uu helay xilligii uu shaqaynayay muddo 10 sanno ah, waana inaanay shaqaalaysiin, aanu u shaqayn ama aanu heshiis la gelin rukhsadle iyo/ama hawlwadeen si waafaqsan xeer-nidaamiyahan muddo 2 sannadood ah.
3. Qofka jebiya qodobkaan waxa uu galay fal-danbiyeed sida uu qabo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Qodobka 23aad: Baarista xisaabaadka H.B.S

1. H.B.S waa inay si hagaagsan u kaydiso xisaabaadka iyo diiwaannada kale ee la xiriira dhaqdhaqaaqyada, hawlgallada, xisaabaadka iyo diiwaannada kale si waafaqsan shuruucda dhaqangalka ku ah maaraynta maaliyadda guud ee dalka.
2. Wasiirku waxa uu, wakhti kasta, soo magacaabi karaa hantidhawre baara xiisaabaadka H.B.S, wuxuuna u warbixintiisa baariseed u gudbinayaa Wasiirka ka hor inta aysan dhammaan muddada uu Wasiirku u cayimo soo gudbinta warbixinta baarista xisaabaadka iyo habka maaraynta maaliyadda H.B.S.

   3. Xubnaha, saraakiisha iyo shaqaalaha H.B.S waa inay siiyaan hantid-dhowraha lagu magacaabay faqradda 2aad ee Qodobkaan dhammaan buugaagta, dukumentiyada, lacagta naqdiga ah iyo hantida maaliyadeed ee H.B.S iyo macluumaad kasta oo ay ka warqabaan kuwaasi oo la xiriira hawlgallada H.B.S .

4. Hantidhawraha Guud ama hantidhawraha lagu soo magcaabay si waafaqsan faqradda 2aad ee qodobkaan waxa uu awood u yeelanayaa inuu u yeero isla markaana qiimeeyo dhammaan shakhsiyaadka uu u arko

inay ku habboon yihiin in la baaro iyada oo ujeeddadu tahay in la helo xog la xiriirta qiimeynta iyo hantidhawridda xisaabaadka.

Qodobka 24aad: Soo gudbinta warbixinno

1. H.B.S waxay u gudbinaysaa Wasiirka warbixinno tifaftiran oo ku saabsan xilgudashadeeda, waxqabadkeeda iyo korjoogtaynteeda ku aaddan fulinta howlgallada batroolka lixdii billoodba mar.
2. Warbixinta lagu xusay faqradda kore waa inay daboosho xog taabanaysa balse aan ku koobnayn waxyaabaha soo socda:
    i. Goobaha u furan sahanka iyo waxsoosaarka batroolka;
    ii. Rukhsadaha sahaminta batroolka ee la bixiyay iyo kuwa la joojiyay;
    iii. Hawlaha batroolka ee la qabtay, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn, la wareegidda xogta iyo qodista ceelasha, sahanka, qiimaynta, horumarinta iyo waxsoosaarka (mugga saliidda iyo gaaska la soo saaray), wajiyada silsilad-qiimeedka batroolka;
    iv. Nuxurka iyo ka qaybgalka maxalliga ah ee hawlaha batroolka;
    v. Iibinta ama wareejinta saami;
    vi. Xaaladda hawlaha horumarinta iyo waxsoosaarka ee hoos imanaya rukhsad walba;
    vii. Sugidda iyo xaqiijinta kharashaadka qandaraasluhu soo dallaco si dib loogu celiyo;
    viii. Xaddiga batroolka la soo saaray iyo inta la saadaalinayo;
    ix. Hannaanka oo uu qayb ka yihiin tuubbooyinka cusub ee la dhisayo iyo hawlaha batroolka ee ay khuseeyaan;
    x. Mashaariicda cilmibaarista iyo horumarinta;
    xi. Canshuurta oo ay ku jirto khidmadda ay bixiyeen shirkadaha heshiiska lala galay;
    xii. caafimaadka, bedqabka iyo deegaanka;
    xiii. Hawlaha furfuridda,
    xiv. Xaaladda khayraadka ee la xiriirta:
        a) Wadarta mugga batroolka la iibiyay lana gudbiyay,
        b) Aagga aan laga faa'idaysan,
        c) Aagga waxsoosaarku ka socdo,
        c) Kaydka aagga waxsoosaarku ka socdo,

E). Khayraadka la helay balse aan weli la ansixin qorshahooda horumari Khayraadka aagga la helay ee hadda loo arko "kuwo ganacsiga ka caaggan";

a) Mugga haydro-kaarboonka asalka ah, kaydka la soo saari karo iyo kaydka la soo saari karo ee harsan (waxsoosaarka rasmiga ah ee marka laga jaro kharashka ku baxay waxsoosaarka) ee aag jira; iyo
b) Xog kasta oo kale oo uu Wasiirku u arki karo lagama-maarmaan.

3. Wasiirku wuxuu u gudbinayaa Golaha Wasiirrada Warbixinta Sanadlaha ah isaga oo raacinaya farriin kasta oo uu arko muhiim.

Qodobka 25aad: Daabicista iyo shaacinta Warbixinnada iyo Xisaabxirka

Soo koobid ku saabsan warbixinta sannadlaha ah iyo bayaanka xisaab-xirka waa in lagu daabaco websaydka H.B.S si dadweynuhu u helaan.

Qodobka 26aad: Xeer-hoosaadka H.B.S

1. Guddiga wuxuu sameyanayaa xeer-hoosaad u gaar ah H.B.S kaasi oo lagu nidaaminayo fadhiyadooda iyo fulinta waajibyadooda.
2. Guddiga waa inuu sida ugu dhaqsiyaha badan ula wadaagaa Wasiirka nuqul rasmi ah oo ah xeer-hoosaadka Guddigu dejiyo.
3. Xeer-hoosaadka ku sheegan faqradda kore waa in uusan ka hor imaanin qodobbada Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyahaan.

Qodobka 27aad: Isugu yeeridda kulan gaar ah ee H.B.S

Wasiirka wuxuu isugu yeeri karaa H.B.S kulan gaar ah waqti walba isagoo ogeysiinaya ajendaha iyo qodobbada kulanka looga hadlayo afar iyo labaatan saacadood ka hor.

Qodobka 28aad: Adeegyada dhinaca saddaxaad

H.B.S waxa ay heli kartaa adeegyada shakhsiyaadka mihnadlayaasha ah waxayna lacagahaas u bixin kartaa si waafaqsan jaangoynta Wasiirka oo ay H.B.S hagayso.

Qodobka 29aad: Wax ka beddelka Xeer-nidaamiyahan

Golaha Wasiirradda ayaa wax ka beddel ku sameyn kara Xeer-nidaamiyahaan marka uuu Wasiirka Wasaaradda u soo jeediyo isagoo aragti ahaan qabo inay lagama-maarmaan u tahay ama muhiimad u leedahay dhaqangelinta ujeeddooyinka Sharciga Batroolka.

Qodobka 30aad: Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahaan

Xeer nidaamiyahaan wuxuu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiiradda.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 30/03/203

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 122

Xeerka Magacaabidda Xubin Maamulka Hay'adda Batroolka Soomaaliya

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha(a) (b,) iyo (g) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha(a) iyo (d) ee Dastuuka KMG.

Markuu arkay: Qodabka 19aad (j) ee Sharciga Batroolka JFS.

Markuu arkay: Aqoonta iyo waayo aragnimadda Liibaan Mahi Maalin

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **MOPMR/0033/2023** ee ku taariikheysan **29/03/2023** kuna saabsaneyd **Magacaabid Xubin Maamulka Hay'adda Batroolka Soomaaliya** ee soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Batroolka & Macdanta.

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/03/2023,** kuna saabsan **Magacaabid Xubin Maamulka Hay'adda Batroolka Soomaaliya** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ansixiyey.

Markuu Garwaaqsaday: Baahida loo qabo buuxinta booska ka banaan Maamulka Hay'adda Batroolka Soomaaliya ka banaan

SHARCI LR. 14 **TAARIIKH: 10 KA SEBTEEMBAR 2023**

SHARCIGA XAFIISKA HANTI-DHOWRKA GUUD ee J.F.S

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "f" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka **XGGGSH/0381/B11/23**, ku taariikhaysan **07/09/2023**, ujeedaduna tahay soo gudbin hindise sharciyeedka Xafiiska Hanti-Dhowrka Guud ee J.F.S.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday ku dhaqanka Sharciga Xafiiska Hanti-Dhowrka Guud ee J.F.S.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/109/2023
TAARIIKH: 29/10/2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J. F.S
Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE SHARCIYEEDKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
17 AUG 2023
SOO GELIDIRECEIVED

CUTUBKA KOOWAAD:
HORDHAC
Qodobka 1aad:
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guudee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Dastuurka.

Qodobka 2aad:
Ujeeddada Sharciga

Ujeeddada Sharcigan waa in:

1) Lagu maamulo Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, kaas oo ah hay'ad dowladeed o o madax-bannaan, sida ku cad Sharcigan iyo Dastuurka JFS.
2) Uu nidaamiyo gudashada waajibka hantidhawris ee saaran Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS iyo xuquuqda helitaanka xogta Xafiisku u baahan yahay.
3) Uu Xafiiska Hantidhawrku warbixin ka siiyo sannadkiiba mar ama natiijada kasoo baxda baaritaannada uu sameeyo Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha Xakuumadda FS.
4) Uu qeexo habka lagu magacaabayo ama xilka looga qaadayo Hantidhawraha Guud ee JFS.

Qodobka 3aad:
Eray-bixin

Erayada hoos ku qoran, haddii aan si kale loogu sheegin macnahooda sharcigan dhexdiisa, waxaa loola jeedaa micnaha mid kasta ku hor qoran:

1) "Wakaalad Dowladeed": waxaa loola jeedaa hay'ad kasta oo madax-banaan, Shirkad, Xafiis, Guddi, Gole, Hay'ad ama Mac-had, Maamul ama urur ay leedahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2) "Wasiir ku haboon": waxaa loola jeedaa marka loo fiiriyo xiriirka ka dhexeeya Hay'ad Dowladeed, wasiirka leh awood maamul oo lagu xusay sharciga la xiriira sharciyadda Hay'addaas.
3) "Sharciga Qoondaynta": waxaa loola jeedaa xeer miisaaniyad sannadeed lacag lagu qoondeeyo oo ku saabsan qabashada iyo isticmaalka maaliyad-sannadeedka xukuumadda ee uu Baarlamaanku ansixiyo, looguna talo galay adeegyada guud ee Dowladda ama mid gaar ah, sida lagu sheegay Sharcigaas.
4) "Xeerka Anshaxa": waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye dhammeystiran oo tilmaamaya anshaxa iyo mabaadi'da hagaysa shaqada dhammaan dadka ka shaqeeya ama u shaqeeya Hay'adaha Dowladda.
5) "Dastuur": waxaa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
6) "Dukumenti": waxaa loola jeedaa xog keydin kasta oo qoraal ah, cod, sawir ama wax kasta oo lagu sameeyo calaamado, jaantusyo, astaamo ama guntimo, kuwaas oo macno u leh dadka aqoonta u leh in ay fasiraan iyo wax kasta oo suuro-gal ah in gudihiisa laga soo saaro ama laga min-guuriyo codad, sawiro ama qoraal, iyadoo qalab farsamo oo kale lala kaashanayo ama aan wax kale lala kaashanayn.
7) "Kharash": waxaa loola jeedaa bixinta lacagaha qoondada ku tala-galka ee Hay'adaha dowladda ee sanadlaha ah ee uu oggolaaday Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.
8) "Amar Kharash-bixin": waxaa loola jeedaa amar lacag bixineed oo ay soo saartay Hay'ad Dowladeed oo awood sharci u leh isticmaalka iyo bixinta kharashkaas.

9) "Miisaaniyadda Federaalka": waxaa loola jeedaa Miisaaniyad Sannadeedka ku tala-galka ee Xukuumadda JFS horgaysay Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si uu u meelmariyo.
10) "Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS": waxaa loola jeedaa Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, sida ku xusan Dastuurka JFS.
11) "Hantidhawraha Guud": waxaa loola jeedaa Hantidhawraha Guud ee JFS oo ah Sarkaal Idman ee Xafiiska Hantidhawrka.
12) "Xukuumadda JFS": waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee xilka haysa ee Golaha Shacabku ansixiyay, sida uu tilmaamay Dastuurka JFS.
13) "Sharciyada Federaalka": waxaa loola jeedaa sharciyada uu meel-mariyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee Heer federaal ah.
14) "Hantidhawr": waxaa loola jeedaa, baaris uu fuliyo Xafiiska Hantidhawrku, si uu u hubiyo in hantida iyo qoraallada maaliyadeed ee hay'ad dowladeed uu waafaqsan yahay shuruudaha maaliyadda, loona isticmaalay kharashyada sidii loogu tala-galay ee sharciga qoondadu farayey.
15) "Madaxa Hay' ad Dowladeed": waxaa loola jeedaa qof kasta oo loo xilsaaray in uu qabto waajibka maamulidda iyo xisaabinta lacagaha ama wax-qabad kale, kuwaas oo loogu talagalay in lagu bixiyo lacago loo qoondeeyey si waafaqsan sharciga
16) "Wasaarad": waxaa loola jeedaa Wasaaradda mas'uulka ka ah Maaliyadda ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
17) "Wasiir": waxaa loola jeedaa wasiirka mas'uulka ka ah Wasaaradda Maaliyadda JFS.
18) "Sarkaal": waxaa loola jeedaa qof kasta oo u shaqeeya hay'adaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
19) "Baarlamaan": waxaa loola jeedaa labada gole ee la isku yiraahdo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sida ku cad Dastuurka Dalka.
20) "Guddiga Maaliyadda": waxaa loola jeedaa Guddiyada Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee u xilsaaran arrimaha Maaliyadda.
21) "Ku Tala-gal Qoondo la Dhowray": waxaa loola jeedaa ku-talo-galka qoondo aan la dhimi karin wax kasta oo dhaca, inta lagu gudo-jiro Miisaaniyad sanadeedka.
22) "Xisaabaadka Dowladda": waxaa loola jeedaa xisaabaadka ay ka mid yihiin; Xisaabaadka dhammaan Hay'adaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xisaabaadka dhammaan Hay'adaha ay Dowladdu ku leedahay saamiga ugu badan, lacagaha kale ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dhammaan Mashaariicda iyo baraamijyada lagu maal-geliyey qaab deyn ama deeq ah oo ka yimid mid ka mid ah Dowladaha shisheeye ama Hay'adaha/Ururrada Caalamiga ah.
23) "Hay'ad Dowladeed": waxaa loola jeeda hay'ad kasta ee ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo maamul ahaan iyo miisaaniyad ahaan u hoos timaadda xayndaabka sharci ee JFS.
24) "Maamulka Maaliyadda Dowladda": Waxaa loola jeedaa u maamulidda dhaqaalaha si waafaqsan sharciga, nidaamka maaliyadda iyo u adeegsiga hababka xaqiijinaya beekhaaminta lacagta iyo isticmaalka wax-soo-saarka hantida Dowladda, si waafaqsan halbeegyada horey loo xaddiday iyo Misaaniyadda Jamhuuriyadda Federaika Soomaaliya.
25) "Maaliyadda/Lacagta Dowladda": waxaa loola jeedaa dhammaan lacagaha ku jira khasnadda dhexe ee Dowladda ama ay maamusho hay'ad Dowladeed ama shaqsi matala iyo lacag ay maamusho hay'ad gaar loo leeyahay, iyadoo oggolaansho ka haysata hay'ad dowladeed oo awood u leh.
26) "Dakhli": waxaa loola jeedaa dhammaan waxa ka soo xarooda canshuuraha, celisyada, qiimaha, waajibaadka, biilasha, ganaaxyada, ciqaabaha, mag-dhaw, kirooyinka waajibay in la bixiyo, faa'iidooyinka iibka iyo dhammaan waxyaabaha kale ee Dowladdu dakhli u

hesho (meel uu ka soo galaba), kuwaas oo Xafiiska Hantidhawrku ku leeyahay awood uu ku sameeyn karo baaris in lagu dhaqmay ama la dhowray shuruucda nidaamiya.

27) "Hay'ad kharash bixisa ama adeeg': waxaa loola jeedaa hay'adaha Dowladda, Shirkadaha ama Wakaaladaha bixiya badeecadda iyo adeegga dadweynaha oo hoos timaadda wasaarad xiriir la leh si toos ah ama dadban, Ra'iisul Wasaaraha, isticmaalana kharashaadka ku jira Miisaaniyadda Federaalka ee la ansixiyay.
28) "Shirkad Dowladeed": waxaa loola jeedaa shirkad dhisan oo ay gacanta ku hayso Hay'ad Dowladeed, taas oo si buuxda ay u maamusho ama maal-gelin ay ku sameyso dakhligeeda hay'addu.
29) "Khasnadda-Mideysan (Treasury Single Account)": waxaa loola jeedaa nidaam isku dhafan ee xisaabo bangi oo awooda in lacagta caddaanka ah ee dawladda loo maareeyo qaab mideysan.
30) "JFS": Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaaliya
31) "F16": Waxaa loola jeedaa Warqada Kharash Bixinta (Expenditure Warrant)

CUTUBKA LABAAD:
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD EE JFS

Qodobka 4aad:
Dib-u-habeynta Xafiiska Hantidhawrka

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu noqonayaa heer Federaal sida ku xusan Dasturka JFS, waxa uuna ka hawl-galayaa dhammaan dhulka Jamhuariyadda Federaalka Soomaaliya.
2) Xafiiska Hantidhawrka Guud waa hay'ad Madax-bannaan, waana hay'adda ugu sarreysa ee Baarista Hantida Dowladda Federaalka, waxa uuna warbixintiisa si kala madax-bannaan ugu gudbinayaa Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha Xakuumadda JFS.
3) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu fulinayaa mabaadi'da maamul wanaagga, hufnaanta, daah-furnaanta, isla-xisaabtanka ku saleysan ka hortagga lunsiga hanti dowladeed.
4) Hantidhawraha Guud ee JFS waxa uu noqonayaa Madaxa ugu sarreeya Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.

CUTUBKA SEDDEXAAD:
HANTIDHAWRISTA, WARBIXINTA IYO LASOCODKA

Qodobka 5aad:
Waajibaadka iyo Mas' uuliyadaha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu leeyahay mas'uuliyadaha soo socda:

1) In uu sameeyo Hantidhawris madax-bannaan si loo ilaaliyo Hantida Dowladda Federaalka iyo in uu bixiyo talooyin lagu xoojinayo isla xisaabtanka, daah-furnaanta iyo hufnaanta nidaamka maamulka maaliyadda ee Dowladda.
2) In uu fuliyo hawlaha hantidhawrka, warbixinna ka siiyo, sida hawlahaas u socdaan Baarlaraanka, Madaxweynaha JFS iyo hadii loo baahdo in uu siiyo Hay'adaha talooyin ku saabsan dhawrista iyo ku dhaqanka sharciga.
3) In uu ilaaliyo dhawrista iyo ku dhaqanka sharciga maamulka maaliyadda iyo miisaaniyadda Dowladda, isaga oo wada-shaqeyn kala yeelanaya dhinacyada arrimahaas khuseeyaan, si kor loogu qaado, loona xoojiyo xirfadda hantidhawrista iyo maamulka maaliyadda.
4) In uu kaalmo xirfadeed iyo talo-bixin siiyo Xafiisyada Hantidhawrka ee Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo hay'adaha kale ee ku shaqada leh ilaalinta hantida iyo xirfadaha hantidhawrka.

5) In uu ku sameeyo hay'adaha dowladda baaris maaliyadeed (financial audit), qiimeynta ku dhaqankooda nidaamka Xisaabaadka iyo hab-raacyada loogu tala-galay, wax-qabadka iyo baarista kale ee la xariirta dhammaan xisaabaadka Guud ee Dowladda, lacagaha, hay'adaha Dowladda, Mashaariicda, barnaamijta, Shirkadaha Dowladdu leedahay ama ay qeyb ku leedahay iyo dhammaan hay'adaha la midka ah ee Dowladda.
6) Waxa uu baarayaa dhammaan xisaabaadka iyo akoonnada Dowladda, Maaliyadda, Mashaariicda, barnaamijyada iyo dhammaan hay'adaha Dowladda, Shirkadaha ay Dowladdu leedahay iyo hay'adaha la midka ah.
7) Waxa uu u gudbinayaa Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud warbixinta hay'adaha, haddii ay baaristiisa ka soo baxaan tuhun fal-dembiyeed, si Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud u sameeyo baaritaano hor leh, loona oogo dacwad ku wajahan cidda la tuhunsan yahay, sidoo kale in uu baaro been-abuurka, wax is- daba-marinta iyo khiyaano kasta oo lagu sameeyo maamulka maaliyadda dowladda, haddii ay ka soo baxaan inta lagu guda jiro howlaha baarista wax muujinayo in ay jiraan tuhun fal-dembiyeed, waxaa loo gudbinayaa hay'adaha ku shaqada leh.
8) Wuxuu daba-gal ku sameynayaa natiijooyinka ka soo baxa baaritaannada iyo talooyinka uu Xafiiska Hantidhawrka Guud hore u bixiyay, si loo hubiyo in la raacay isla markaana la saxay khalaadaadkii hore loo tilmaamay.
9) Waxa uu diiwaan-gelinayaa dhammaan qandaraasyada, heshiisyada, Shuruucda, xeerarka, deeqaha, deymaha, damaanadaha, kala wareejinta miisaaniyadda iyo dikreetooyinka Ra'iisul Wasaaraha iyo Madaxweynaha JFS.
10) Wuxuu sameeyaa diiwaan-gelinta awood siinta kharash bixinta (F16) kolka kharashku baxo kadib, si uu dib ugu sameeyo baaritaan. Diiwaan-gelinta awood siinta kharash bixinta (F16) looma adeegsan karo qaab ansixin ah.
11) Waxa uu sameynayaa oo kale hawl kasta oo suuro gelinaysa in laga guul gaaro waajibka xisaab xirka, sida ku cad Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee JFS.
12) Xafiiska Hantidhawrka Guud waxa uu inta lagu gudo jiro hawlaha hantidhawrista xaqiijinayaa:
    b) In diiwaannada xisaabinta si sharciga waafaqsan loo adeegsado, loona hayo ama loo keydiyo.
    t) In xeerarka, hab-raacyada iyo kormeerada gudaha ee la adeegsado ay yihiin kuwo ku filan, si loo helo ilaalin wax-ku-ool ah oo ku saabsan qiimeynta, uruurinta iyo qoondeynta dakhliga Dowladda.
    j) In dhammaan lacagta la kharash gareeyey iyo midda la dhigay khasnadda dhexe sidii loogu tala-galay loo isticmaalay, sababtii ama sababihii lagu tilmaamay miisaaniyadda ku tala-galka Dowladda, sida ku cad xeer-miisaaniyeedka ay Labada Gole ee BFS ansixiyeen, iyadoo waliba la tixgelinayo xaqiijinta habka kormeerka iyo hantidhawrista gudaha ee Hay'adaha Dowladda.
    x) In kormeerrada gudaha, xeerarka iyo hab-raacyada la sameeyey ee la raacay ay yihiin kuwo ku filan xaqiijinta kormeerka xarumaha, keydinta alaabta ama bakhaarada iyo qeybaha kale ee hantida Dowladdu taalo.
13) Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu hubinayaa in hantida Qaranka loo kharash gareeyey si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.
14) Xafiiska Hantidhawraha Guud ee JFS waxa uu baaris ku samaynayaa dhamaan Nidaamyada Macluumaadka Teknoolojiyada (ICT Audit) ee dowladu adeegsato, iyada oo loo fulinayo si waafaqsan Heerarka Tiknoolajiyada Macluumaadka caalamiga ah ee Soomaaliya aqoonsan tahay.
15) Xafiiska Hantidhawrka ee JFS waxa uu baarayaa dhammaan hay'adaha iyo shirkadaha ay Dowladdu leedahay ama qeybta ku leedahay, waxa uuna warbixintiisa u gudbinayaa Labada Gole Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS iyo Hay'adda ay khuseyso baarista.

16) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu qandaraas hoose la geli karaa hantidhawreyaal madax-bannaan, la-taliyeyaal iyo khabiiro aqoon u leh hawsha la baarayo, iyadoo la tixraacayo Sharciyada JFS, lana tixgalinayo Miisaaniyadda Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.

17) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu sameynayaa baaritaannada wax-qabadka (performance audit), waxa uuna baarayaa illaa iyo inta/heerka ay hay'adaha Dowladdu u adeegsadaan dhaqaalaha iyo kheyraadka si sax ah iyo in ay hawlaha u fuliyaan sidii loogu tala-galay, iyada oo la tixraacay Miisaaniyadda Dowladda iyo Sharciyadda JFS.

18) Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu xaqiijinayaa in lacagaha Federaalka ee la siiyey Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, loo isticmaalay sidii loogu tala-galay oo ay ku jiraan deeqaha iyo deymaha caalamiga ah ee Dowladda FS ay si rasmi ah u saxiixday, si loo hubiyo in lacagahaasi ku baxeen sidii ku tala-galku ahaa, waxa uuna warbixintiisa u gudbinayaa Labada Gole ee Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda FS iyo dowlad-goboleedka ay khuseyso baarista.

19) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu u fuliyaa hawlaha hantidhawrista si waafaqsan halbeegyada Hantidhawrista caalamiga ah ee la aqoonsan yahay oo ay oggoshahay ku dhaqankooda JFS.

20) Inta ay ku jiraan hawlaha baarista, dhammaan shaqaalaha ka hawlgala Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa ay ilaalinayaan xeerka anshaxa ee Xafiiska iyo xeerarka caalamiga ah ee ay oggoshahay ku dhaqankooda JFS.

21) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS marka uu ka warbixinayo xog kasta oo qarsoodi, sir ama gaar ah waxa uu:

   b) Dhowrayaa sharciyada ilaaliya xogta gaarka u ah baarista ay ku sameeyeen qofka, hay'adda, shirkadda, Dowladda Federaalkaba iyo Dowladaha xubnaha ka ah DFS, iyadoo la tixgelinayo nooca gaarka ah ee xogta uu bixinayo;

   t) Bixinayaa talo ku saabsan natiijada baaristiisa oo uu siinayo Labada Gole ee Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS iyo madaxa mas'uulka ka ah hay'adda ay xogtu khuseyso, waxaana warbixinta hantidhawr ee xogtaas lagu xaddidayaa inta looga maarmi waayo bixinteeda.

22) Faqradda 21aad ee Qodobkan kama reebayso Xafiiska Hantidhawrka Guud in uu caddeeyo ama muujiyo natiijada ka soo baxda baarista lagu sameeyay isticmaalka kharash aan la fasixin ama si khalad ah ku baxa ama loo isticmaalay ama uu ka dhashay ficil khalad ah ama dembi ah ee la xariira arrimaha sharciga maareynta maaliyadda guud oo ay ku kacday hay'adda mas'uulka ka ah, iyadoo aan la faafinayn caddeynta, xaqiiqooyinka wax u dhimaya ama dhaawacaya danta guud ee JFS.

23) Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu samaynayaa hawlo baaris hantidhawr oo ku salaysan hab-raacyada shuruucda dalka, nidaamyada iyo halbeegyada Hantidhawrka ee la aqoonsan yahay caalami ahaan, marka ay ka codsadaan sidaas Labada Gole ee Baarlamaanka JFS ama midkood, Madaxweynaha JFS, Ra'iisul Wasaaraha xukuumadda JFS iyo Hay'adaha kale ee dowladda.

24) Xafiiska Hantidhawrka JFS wuxuu samaynayaa baaris fatash ah (forensic audit) oo la xiriirta hawlaha wax-is-dabo marinta, khiyaanada, ku takrifalka awoodeed iyo si xun ama khaldan u adeegsiga hantida dowladda.

25) Inta uu ku guda jiro xil-gudashadiisa, Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu joojin karaa dhaq-dhaqaaqa xisaabta socota ee Hay'adda uu baarayo, sidoo kale waxa uu Maxkamadda ay khuseyso ka codsan karaa in safarka laga joojiyo cidda ay baaristu ku socoto.

Qodobka 6aad:
Warbixin Sannadeedka Xafiiska Hantidhawrka

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu ku baarayaa Xisaabaadka Dowladda muddo Labo (2) bilood gudahood ah oo ka bilaabata marka uu helo xisaab-xirka

sannadlaha ah ee Dowladda ugu dambeyn 30ka April si waafaqsan Sharciga Lr. 17 Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, waxa uuna natiijada ka soo baxda shaqada barista u gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya isaga oo nuqul ka siinaya Madaxweynaha JFS iyo Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha XFS.

2) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu raacinayaa iyadoo aanay ku koobnayn warbixin sannadeedka arrimaha soo socda:
   b) Aragtida baarista Xafiiska ee ku aaddan xisaabaadka Dowladda;
   t) Natiijooyinka muhiimka ah iyo talooyinka la xiriira ammaanada, joogtaynta shaqada, beekhaaminta dakhliga, ku filnaanta/kabidda iyo sida ay wax-kuool u tahay habka loo maamulay maaliyadda Dowladda.
   j) Wax kasta oo gaabis ah oo lagu ogaaday nidaamka ilaalinta iyo kontoroolka maaliyadeed oo gudaha ee ay leedahay hay'ad kasta ee isticmaasha dhaqaale dowladeed;
   x) Faahfaahin ku saabsan diiwaannada asaasiga ah ee aan la dhowrin ama xeerarka iyo hab-raacyada loo adeegsaday ee aan ku filnayn in lagu ilaaliyo ama lagula socdo hantida Dowladda; iyo
   kh) Ilaa iyo xadka ay tahay in ay adeegsatay hay'adda isticmaashay kharashka, talooyinka la socday warbixinnada iyo qaraaraadka ka yimid Guddiyada Maaliyadda Labada Gole ee BFS.
3) Warbixinnada Hantidhawrka waxaa ka mid noqon kara faallooyin ay bixiyaan hay'adaha Dowladda ee ay khuseyso. Hase yeeshee Xafiiska Hantidhawrka JFS ayaa leh in uu si buuxda oo tifaf-tiran u ilaaliyo warbixinnadiisa ku lifaaqan Xisaab- xirka Miisaaniyadda.

Qodobka 7aad:
Warbixinnada Baaritaannada Gaarka ah

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu go'aansan karaa ama Baarlamaanku ka codsan karaa in u sameeyo baaritaanno gaar ah oo uu ka diyaariyo warbixinno gaar ah.
2) Inta lagu gudo-jiro sannadka, Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu u gudbin karaa warbixinnada gaar ah Labada Gole ee BJFS, warbixinnadan waxaa suurta-gal ah in sidoo kale lagu daro warbixin sannadeedka Hantidhawrka.

Qodobka 8aad:
Helitaanka Xogta

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waa in uu si dhameystiran uga helaa cid ama hay'ad weliba uu weydiisto xogaha uu u baahan yahay, si uu uga guto waajibaadkiisa baariseed.
2) Madaxa hay'adda Dowladda, maaliyadda, mashaariicda iyo barnaamijyada Xukuumadda FS iyo Baarlamaanka JFS, waa in uu u xaqiijiyaa in Xafiiska Hantidhawrka JFS uu wakhtiga ugu habboon la kulmo dadka, ama helo dukumentiyada, kumbuyuutarada iyo nidaamyada kale ee xogta lagu keydiyo iyo sidoo kale hantida la xirirta gudashada iyo meel-marinta shaqooyinka, waajibaadka iyo awoodaha Xafiiska Hantidhawrka JFS leeyahay.
3) Madaxa hay'adda Dowladda, maaliyadda, mashaariicda iyo barnaamijyada Xukuumadda FS iyo Baarlamaanka JFS, waa in uu la wadaago Xafiiska Hantidhawrka JFS, wakhti kasta oo loo baahdo ama si joogto ah oo wakhtiyeysan dhaqdhaqaaqa xisaabaadka hay'adaha Dowladda, hadba sida uu u dalbado Xafiiska Hantidhawrku, si waafaqsan habka maamulka maaliyadda, sharciga maaliyadda iyo Sharcigan Hantidhawrkaba.
4) Hantidhawreyaasha gudaha ee hay'adaha Dowladda, maaliyadda, mashaariicda iyo barnaamijyada Xukuumadda FS iyo Baarlamaanka JFS, iyada oo la qaddarinayo xirfadda ay wadaagaan, waxaa ku waajib ah in ay siiyaan Xafiiska Hantidhawrka JFS nuqul ka mid ah warbixinnada ugu dambeeyey ee ka soo baxay Hantidhawrka gudaha.

is-daba-marin ama lunsi hanti ummaddu leedahay.

Qodobka 11aad:
Dib-u-eegista Warbixinnada Xafiiska Hantidhawrka

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa dib u eegis ku samayn kara, ka dooda

Qodobka 12aad:
Bixinta Xogta

1) Isaga oo aan ka haysan oggolaansho qoraal ah ee Hantidhawraha Guud, qofna ma daabici karo, mana bixin karo xog la helay, iyada oo lagu gudo jiro baaris hantidhawris ee lagu sameeyey cid kasta marka laga reebo inta uu Sharcigu u oggolaanayo ama maxkamadi ku amarto.
2) Hantidhawraha Guud ee JFS oo eegaya xeer-nidaaminta xog-bixinta islamarkaana tixgelin gaar ah siinaya danta guud iyo waajibaadka xirfadeed ee ku saabsan sirta xogta la bixinayo, go'aan ka gaaraya waxyaabaha noqonaya xogta gaarka ah iyo qaabka ugu habboon ee loo bixin karo sida sharcigu jideeyey.

Qodobka 13aad:
Diiwaan-gelin

1) Xafiiska Hantidhawrku waxa uu diiwaan-gelinayaa dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada ay hay'adaha dowladdu la gelaan dowlad kale ama shirkado gaar loo leeyahay. Diiwaangalinta Hantidhowraha guud waxay ka dhigan tahay xaqiijinta in qandaraaskii uu helay Hanti-dhowraha guud si loo diiwaan galiyo. Hanti-dhowraha Guud wuxuu xaqiijinayaa oo keliya in qiimaha ku yaalla qandaraaska uu la jaan qaadayo ama uusan khilaafsanayn miisaaniyadda loo qoondeeyay Hay'adda iyo in saxiixa lagu saxiixay Qandaraaska uu yahay midka rasmiga ah sharci ahaan. Inta lagu jiro diiwaangelinta qandaraaska, Hantidhowraha Guud awood uma leh inuu dib-u-eegis ku sameeyo ama uu ansixiyo arrimaha kale ee qandaraaska, ama kuwa la xiriira tallaabooyinka iyo hababka uu soo maray amma u jeedooyinka dhaqaale ee qandaraaska loo bixiyey.
2) Xafiiska Hantidhawrka JFS wuxuu diiwaan-gelinayaa dhammaan Xeerarka iyo qaraarada ka soo baxa Baarlamaanka, Madaxda Dowladda sida Ra'iisul Wasaaraha ama Madaxweynaha JFS.

Qodobka 14aad:
Heshiisyada Hantidhawrayaal Ka Baxsan Xafiiska Hantidhawrka

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu heshiis la gali karaa haddii loo baahdo oo ah Qandaraas shaqo ee hantidhawrayaal madax-bannaan oo ka baxsan Xafiiska Hantidhawrka si ay u fuliyaan shaqo baaris oo baahi gaar ah loo qabo waxayna ka imaan karaan urur/hay'ad la timaadda awood iyo sumcad hantidhawris oo ay u dheer tahay khibrad iyo tixgelinno kale.
2) Urur/hay'ad kasta oo sameynaysa shaqo hantidhawr, iyaga oo ku shaqaynaya tilmaamaha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxay shaqadooda u fulinayaan si waafaqsan halbeegyada Sharciga Xafiiska Hantidhawrka, sida ku xusan qodobka 5aad ee Sharcigan, heshiisyada Hantidhawrista caalamiga ah ee ay dowladda Soomaaliya qeybta ka tahay iyo heshiisyada urur goboleedyada Hantidhawrka ee waafaqsan sharciyada dalka.

CUTUBKA AFARAAD:
QAAB-DHISMEEDKA IYO MAGACAABISTA

Qodobka 15aad:
Qaab-dhismeedka Xafiiska Hantidhawrka

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS wuxuu yeelanayaa qaab-dhismeedka hoos ku xusan:

1) Hantidhawraha Guud;
2) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud;
3) La-taliyaha Sharciga ee Xafiiska Hantidhawrka Guud;
4) Agaasimayaasha Waaxyaha;
5) Xafiisyada Qeybaha iyo Unugyada;

6) Baareyaasha iyo hawl-wadeennada kale.

Qodobka 16aad:
Xarunta Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS

Xarunta Xafiiska madaxa-bannaan ee Hantidhawrka Guud ee JFS waa magaalo Madaxda dalka, wuxuuna xarumo ku yeelan karaa dhamaan dalka oo idil.

Qodobka 17aad:
Shuruudaha Hantidhowrka Guud

Shuruudaha soo socota ayaa lagu soo xulayaa Hantidhawraha Guud:

1) In uu yahay/tahay muwaadin Soomaaliyeed.
2) In uu Ieeyahay/Ieedahay hoggaamin iyo sumcad wanaagsan.
3) In uu dhimirkiisu/keedu dhan yahay.
4) In aysan da'diisu/deedu ka yareyn 40 sano.
5) In uu leeyahay/leedahay aqoon durugsan oo heer takhasus jaamacadeed, lana aqoonsanyahay oo la xiriirta Sharciga (law), Hantidhawrka, maamulka maaliyadda Dowladda, xisaabaadka ama dhaqaalaha;
6) In uu leeyahay/leedahay aqoon xirfadeed (Professional Certificates) oo la xirirta sharciga, Maamulka maaliyadda Dowladda iyo xisaabaadka Hantidhawrka.
7) In uu leeyahay/Ieedahay ugu yaraan toban (10) sano khibrad shaqo ah; iyo
8) In aan maxkamad ku xukumin wax dembi ah oo uu galay/gashay.

Qodobka 18aad:
Habraaca Magacaabista Hantidhawraha Guud ee JFS

3) Magacaabidda Hantidhowrka Guud waxaa soo jeedinaya Golaha Wasiirrada, waxaana ansixinaya BJFS, isla markaana waxa Xeer Madaxweyne ku meelmarinaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
4) Inta uusan billaabin shaqada Xafiiska, Hantidhawraha Guud waxaa la marinayaa "Dhaar" lagu maamuuso Madaxweynaha JFS hortiisa.

Qodobka 19aad:
Muddo-xileedka Hanti-dhowraha Guud ee JFS

1) Hantidhawraha Guud wuxuu shaqeynayaa muddo Shan (5) sanno ah, waxaana loo cusbooneysiin karaa shaqada hal mar oo keliya, iyadoo la raacayo hab-raaca ku xusan qodobkan, laakiin wuxuu hawlgab noqonayaa kadib marka uu gaaro sannadka hawlgabka sida ku cad Sharciyada Federaalka ee qeexaya hawlgabka, xaqsiinta, waxaa loo raacayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dowladda ee JFS.
2) Inta uusan billaabin shaqada Xafiiska, Hantidhawraha Guud waxaa la marinayaa "Dhaar" lagu maamuuso Madaxweynaha JFS hortiisa.

Qodobka 20aad:
Madax-bannaanida Xafiiska Hantidhawrka JFS

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, marka u howshiisa gudanayo waa ka madax-bannaan yahay dhammaan laamaha dowladda, waana in uu u hoggaansamaa Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.
2) Xafiiska Hantidhawrka Guud inta uu ku guda jiro fulinta, meel-marinta shaqada & mas'uuliyadihiisa waa in uusan jirin amar ama kor-joogteyn uu ku leeyahay qof ama maamul kale.
3) Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu leeyahay xasaanad aan dacwad lagu oogi karin, inta uu ku guda jiro gudashada hawlaha caadiga ah ee Xafiiska, hadaysan jirin fal dambiyeed cad oo uu gacanta kula jiro.

4) Marka la magacaabo Hantidhawraha guud kadib ma qaban karo xil siyaasadeed, mana la yeelan karo xiriir shaqo oo toos ah iyo mid dadban toona xisbi siyaasadeed ama hay'ad gaar loo leeyahay ama mid Dowladeed, mana sameyn karo hawlo Hantidhawraha Guud ka faa'iidayo ama saameyn ku yeelanaya awoodaha ama xilka Xafiiska Hantidhawrka JFS, inta uu hayo xilka Hantidhawraha Guud.
5) Hantidhawraha Guud waa in uu ka fogeeyo naftiisa/nafteeda ballanqaad, waajibaad ama maalgashi kasta oo ku keenaya khilaaf dhab ah ama ka hor imanaya danta Xafiiska.
6) Xafiiska Hantidhawraha Guud waxa uu wada-shaqayn la yeelan karaa ama ka geyb-qaadan karaa hawlo hantidhowrista xirfadeed, ka qaban karaa jago ururo xisaabeed iyo hay'addo sameeya halbeegyada hantidhawrka, kuwaas oo hawlahoodu aysan ka hor-imaanayn doorka iyo hawlaha Xafiska Hantidhawrka JFS.
7) Xafiiska Hantidhawraha Guud waxa uu u xilsaari karaa qeybo ka mid ah shaqooyinkiisa saraakiil kale oo ka mid ah Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, laakiin u xil-saaristaasi kama qaadeyso mas'uuliyaddiisa Xafiiska iyo in lagula xisaabtamo Hantidhawraha Guud waxa ka dhasha ficillada ay sameeyaan dadka uu u xilsaaray qabashada shaqooyinkaas.
8) Xeerka anshaxa ayaa qabanaya Hantidhawraha Guud, ku-xigeennada, saraakiisha iyo dadka kale ee ka shaqeeya Xafiiska Hantidhawrka Guud ama matela Xafiiska.
9) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu u madax-bannaan yahay go'aan ka gaaridda Qaab-dhismeedka Xafiiska, iyadoo aan ka hor imaanayn Qodobka 15aad ee sharcigan.
10) Xafiiska Hantidhawrka ee JFS waxa uu fulinayaa mabaadi'da maamul wanaagga, hufnaanta, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka oo ku saleysan ka hortagga lunsiga hantida dowladda.

Qodobka 21aad:
Xil-waayidda Hantidhawraha Guud ee JFS

Hantidhawraha Guud waxa uu xilkiisa/keeda ku waayi karaa sababaha soo socda midkood:

1) In ay ku timaado geeri;
2) In uu xilka iska casilo, isagoo u gudbinaya Madaxweynaha JFS codsi qoraal ah oo uu ku caddeynayo in uu rabitaankiisa isaga casilayo xilka Hantidhawraha Guud;
3) In uu gaaro da'da hawl-gabka ee sharcigu tilmaamay, hasa yeeshee haddii ay jirto baahi in aan looga maarmin shaqada waxaa la waydiisan karaa in uu sii wado shaqada, iyadoo ay ku xiran-tahay in uu Hantidhawraha gaaray da'da hawl-gabka oggolaado in uu sii shaqeeyo;
4) In Maxkamadi ku hesho dembi, kaas oo uu ka dhasho xukun maxkamadeed intii uu doonaba ha la-ekaadee;
5) Caafimaad darro keeni karto in uu gudan waayo xilka iyo waajibaadka Xafiiska;
6) Waxaa Hantidhawraha Guud xilka Xafiiska looga qaadi karaa marka uu awoodi waayo in uu fuliyo shaqooyinka Xafiiska, sababo xil-gudasho la'aan, dayacaad xil, jabin ama xadgudub cad oo uu ku sameeyo fulinta xirfadeed iyo waajibaadka shaqo ama ku takrifal awoodaha sharci ee Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Qodobka 22aad:
Xil-ka-qaadista Hantidhawraha Guud

1) Marka ay Madaxweynaha JFS soo gaarto cabasho ka dhan ah Hantidhawraha Guud ama sababta xilka looga qaadayo Hantidhawraha ay tahay mid ka mid ah arrimaha ku cad Qodobka 21(5) iyo (6) Madaxweynaha JFS ayaa magacaabaya guddi madaxbannaan ka kooban todobo (7) xubnood oo kala ah:
    b) Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda Golaha Shacabka
    t) Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda Aqalka Sare
    j) Labo (2) Garsoore oo ka mid ah Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee dalka, iyo
    x) Guddoomiyaha Bulshada Rayidka ee Soomaaliya.

kh) Guddoomiyaha Ururka Qareennada ee Heer Federaal

d) Guddoomiyaha Ururka Xisaabiyaasha Soomaaliyeed ee Heer Federaal

2) Xubnaha Guddigaas waxa ay daraasad, baaris iyo taxliilin ku sameynayaan arrimaha sababay cabashada ka dhanka ah Hantidhawraha Guud iyo in ay arrimahaasi yihiin kuwo sababi kara eedeyn, waxa ayna ugu badnaan muddo Afartan iyo Shan (45) cisho gudahood warbixintooda iyo talo-soo-jeedintooda u gudbinayaan Madaxweynaha JFS, si uu ugu go'aan qaato.
3) Sida ku cad faqradaha kala duwan Qodobka 21aad ee Sharcigan, mar kasta oo uu xilka laga qaado ama uu iscasilo Hantidhawraha Guud, waxaa lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee dowladda, iyadoo muddo Sagaashan (90) maalmood gudahood ah lagu soo magacaabayo Hantidhawre Guud oo cusub.
4) Waxaa sii-haye ahaan Xafiiska hawlihiisa u sii wadaya labada ku-xigeen ee Hantidhawraha Guud midka shaqada Hantidhawrka ku soo horeeyey, inta laga soo magacabaayo Hantidhawraha cusub.

Qodobka 23aad:
Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud

1) Labo ku xigeen ayaa loo magacaabayaa ku-xigeennada Hantidhawraha Guud.
2) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud waxaa laga dhex magacaabi karaa Saraakiisha sare ee Xafiiska Hantidhawraha Guud, waxaa kale oo laga keeni karaa bannaanka, waana in uu yahay qof buuxiyey shuruudaha ku xusan qodobka 17aad ee sharcigan.
3) Ku-xigeenka Hantidhawraha Guud marka laga keenayo Saraakiisha Xafiiska waxaa la magacaabayaa iyada oo la tixgelinayo hab-raaca dallacaada Shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka Guud.
4) Ku-xigeenka Hantidhawraha Guud marka uu bannaanka ka imaanayo wuxuu shaqada Xafiiska Hantidhawrka Guud ku soo gelayaa tartan furan iyo hab-raac waafaqasan sharcigan.
5) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud waxaa soo jeedinaya magacaabistooda Hantidhawraha Guud ee JFS, waxaana Xeer Madaxweyne ku soo saaraya Madaxweynaha JFS.
6) Labada Ku-xigeen kii uu u magacaabo Hantidhawraha Guud ee JFS ku-sime ayaa:
    b) Sii-wadaya xilka Hantidhawraha Guud, waqtiga uu ku maqan yahay Hantidhawraha Guud fasax, hawlo shaqo ama xanuun.
    i) Ku-simaha ama sii-hayaha wuxuu u qabanayaa shaqooyinka Xafiiska sida Hantidhawraha guud u maamulayey.
    j) Ku-xigeenka Hanti-dhawraha Guud, marka uu yahay ku-sime ama sii-haye xilka Hantidhawraha Guud wuxuu leeyahay mid la mid ah awoodaha, xasaanadda iyo madax- bannaanida uu leeyahay Hantidhawraha Guud.

Qodobka 24aad:
Xil-ka-qaadista Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud

1) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud waxaa xilka Xafiiska looga qaadi karaa si waafaqsan habka lagu magacaabay, sida ku cad Qodobka 23aad ee Sharcigan, iyadoo loo marayo si waafaqsan hab-raacyada xilka qaadista ama shaqo ka joojinta ee lagu caddeeyey siyaasadaha la ansixiyey ee maamulka shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.
2) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud waxaa xilka Xafiiska looga qaadi karaa sababo la xiriira in uu awoodi waayo gudashada ama fulinta waajibaadka iyo shaqooyinka xafiiskiisa/keeda, taasoo ka dhalatay xaalad caafimaad, ama jabin cad oo uu ku sameeyo/sameyso fulinta xirfadeed ee shaqada Xafiiska.
3) Xil ka qaadista Ku-xigeenka Hantidhawraha Guud waxaa soo jeedinaya Hantidhawraha Guud ee JFS, waxaana xeer ku soo saaraya Madaxweynaha JFS.

Qodobka 25aad:
Shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waa Hay'ad Dowladeed oo madax-bannaan sida ku xusan Dastuurka JFS, waxa uuna yeelanayaa shaqaale hadba intii lagama maarmaan u ah fulinta iyo habsami-u-socodka shaqooyinka Xafiiska ee Sharcigan lagu xusay.
2) Shaqaalaha Xafiisku waxa ay ku imaanayaan tartan furan oo ku salaysan aqoon iyo khibrad la xiriirta shaqada Xafiiska, si waafaqsan sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Siyaasadda Maamulka Shaqaalaha ee Xafiiska Hantidhawrka.
3) Dhammaan xulashada/qaadashada shaqaalaha iyo hawl-wadeennada Xafiiska waa in lagu xaqiijiyo hab-raac hufnaan leh oo ku saleysan khibrad, waayo aragtinnimo iyo halbeeg xirfadeed, waxaana loo marayaa hab-raaca ku xusan Siyaasadaha iyo Xeer-hoosaadka Xafiiska Hantidhawrka Guud.
4) Xafiiska Hantidhawrka Guud waxa uu dejinayaa siyaasado iyo xeer-hoosaad la ansixiyey oo uu ku shaqeynayo Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, kuwaas oo caddeynaya dhammaan xaaladaha, shuruudaha, dallacaadda, asluubta shaqada iyo arrimaha kale ee maamulka shaqaalaha Xafiiska si waafaqsan Sharcigan iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.
5) Shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxaa laga wada diiwaangelinayaa Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda Federaalka Soomaaliya.
6) Qaadashada Shaqaalaha waxaa loo marayaa si lamid ah xafiisyada madaxa-bannaan, waafaqsanna Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.
7) Dallacaadaha, xaqsiinta oo ay ku jiraan (mushaarka & gunnooyinka) iyo dhiiragelinta shaqaalaha waxaa loo marayaa hab-raac mudnaan siinaya dabeecadda shaqada oo ka duwan shaqooyinka kale ee Dowladda, si loo ilaaliyo Shakhsiyadda, madax-banaanida Xafiiska iyo xuquuqaha ka dhalanaya duruufaha ay ku shaqeynayaan shaqaalaha.
8) Xuquuqda iyo shuruudaha oo uu mushaarku ka mid yahay waxaa xaddidaya sharciga iyo xeerarka shaqaalaha Rayidka, iyadoo taasi aysan ka hor imaanayn in Xafiisku sameyn karo dhiirrigelin iyo gunnooyinka ku dhisan dabeecadda shaqada dheeraadka ah ama lagama maarmaanka u ah waajibaadka Xafiiska, isla markaana miisaaniyadda Xafiisku oggolaaneyso, taasoo lagu qeexayo hab-raac waafaqsan sharciga.
9) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu yeelanayaa labo Guddi oo kala ah: Guddiga Dallacaadda, Abaal-marinta, iyo Anshax-marinta iyo Guddiga Goob Shaqo, kuwaas oo ku imaanaya, una hawlgalaya si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

CUTUBKA SHANAAD:
MIISAANIYADDA IYO ISLA-XISAABTANKA

Qodobka 26aad:
Miisaaniyadda

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu leeyahay miisaaniyad u gaar ah oo dabooli karta gudashada waajibaadkiisa sharci si wax-ku-ool ah, iyadoo uu diyaarinayo una gudbinayo Wasiirka Maaliyadda si uu ugu soo daro Buugga Qoondada Miisaaniyadda Dawladda.

Qodobka 27aad:
Deeqaha

1) Ka sokoow Miisaaniyadda Dowladdu u qoondaysay, Xafsiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu deeq ka heli karaa Hay'adaha deeqaha bixiya, taasoo ah kaalmo lagu tayeynayo adeegga Xafsiisku u hayo Dowladda, waxaana ka mid noqon kara tababarro waqti gaaban ama waqti dheer ah oo aqoon kororsi ah ama agabka fududeeya shaqada.

2) Heshiis kasta oo galo Xafiiska Hanti-dhawrka ee uu ku helayo deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, waxaana la waafajinayaa hab-raaca maamulka maaliyadda dalka iyo qorshaha maaliyadda Dowladda.

Qodobka 28aad:
Warbixinta Waxqabadka Sanadlaha ah ee Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS

1) Hantidhawraha Guud waxa uu sannad walba u gudbinayaa Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha xukuumadda FS warbixin sannadeed iyo qoraallada maaliyadeed ee Hantidhawrka sannadlaha ah ee uu sameeyo Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.
2) Warbixinta waa in ay ku jirto warbixin ku saabsan ilaa iyo inta uu Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS ku guuleystay qorshe sannadeedkiisa, xisaab-xirka iyo qoraaladda maaliyadeed ee Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.
3) Warbixin sannadeedka wax-qabadka ee ka soo baxda ama uu soo saaro Xafsiiska Hantidhawrku waxaa lagu daabacayaa barta Mareegta (internet) Xafiiska Hantidhawrka si ciddii danaynaysa uga hesho, waxaana sida ku cad qodobka 5aad (21) ka reeban in la daabaco xogaha gaarka ah oo aysan habboonayn in ay cid kasta ogaato.

CUTUBKA LIXAAD:
ISKAASHI HEER QARAN AMA CAALAMI AH

Qodobka 29aad:
Iskaashi Heer Qaran ah

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu sameynayaa xiriiro xirfadeed oo shaqo oo uu la leeyahay dhammaan Xafiisyada Hantidhawrka Guud ee Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.
2) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu xaqiijinayaa in sannad walba baaris xisaabeed lagu sameeyo lacagaha ay Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya siiso dhammaan Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.
3) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu sidoo kale xaqiijinayaa in sannad walba baaris Hantidhawr lagu sameeyo dhammaan deeqaha, tabarrucaadka iyo deymaha caalamiga ah ee la siiyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, kuwaas oo heshiiskooda ay gashay Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
4) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu soo saarayaa warbixino dhammeystiran ee la xariirta hawlaha Hantidhawrka, waxa uuna u dirayaa Dowlad-goboleedka la baaray, Labada Gole ee Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha Xukuummadda FS.

Qodobka 30aad:
Iskaashiga Heer Caalami ah

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu iskaashi la sameysan karaa hay'adaha hantidhawrista ee Dowladaha kale leeyihiin ama ururo hantidhawr oo caalami ah, si loo sameeyo shaqooyin Hantidhawr oo Heer Qaran ama Heer Caalami ah iyo kuwo isku jir ah, waxa uuna Xafiisku xubin ka noqon karaa hay'adaha caalamiga ah ee Hantidhawrka Sare (The International Organization of Supreme Audit Institutions (INTOSAI), si waafaqsan shuruucda Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 31aad:
Qiimeynta Hantidhowrka

Si loo ilaaliyo sharciga, looga hortago ku tagri falka awoodaha, loona hubiyo in si sharciga waafaqsan loo fuliyay shaqadii Hantidhawrka, labadii sanaba halmar, waxaaGuddiga Maaliyadda ee Baarlamaanku u dirayaan si tartan furan ah, Hantidhowre madax banaan, taas oo eegaysa in

Xafiiska Hantidhawrka shaqadiisa u qabtay labadii sano ee lasoo dhaafay si wafaaqsan shuruucda dalka, halbeegyada xirfadeed iyo nidaamka caalamiga ah ee hantidhiwridda xisaabaha dowladda.

CUTUBKA TODDOBAAD:
DEMBIYADA IYO CIQAABAHA

Qodobka 32aad:
Dembiyada

1) Qofku wuxuu dembi galayaa marka:
   b) Isaga oo aan heysan caddeyn sharci ah ama cudur-daar la'aan uu si ula kac ah uga hor-istaago baareyaasha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS in ay gutaan waajibaadkooda shaqo ee ku cad Sharcigan.
   t) Isaga oo aan heysan cudur-daar macquul ah uu diido ama uu ku guul-darreysto in uu u hoggaansamo amar ama tilmaan kasta oo laga bixiyey Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS oo la xiriirta baaris socota.
   j) Isaga oo aan heysan caddeyn sharci ah ama cudur-daar la'aan uu diido ama ku guul-dareysto in uu siiyo baare ka socda Xafiiska Hantidhawrka JFS in uu helo buugaagta hanti kasta, diiwaannada, baaqiga lacageed ama qoraaladda kale, xogta elektoroniga ah ama kuwa kale ee lagu caddeeyey Sharcigan.
   x) Isaga oo og uu siiyo baare ka socda Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS qoraallo been ah ama la been-abuuray, taasoo uu uga dan leeyahay in uu wax-qariyo ama ku marin habaabiyo Xafiiska Hantidhawrka.
2) Sidoo kale xubin kasta oo ka mid ah Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu galayaa dembi haddii uu;
   b) Ka dalbado ama ka qaato wax laaluush ah, tixgelin uu ku raadsanayo beddelasho ama wax abaalmarin ah si uu uga gaabiyo ama uusan u gudan waajibaadkiisa.
   t) Isaga oo og uu ku guul-dareysto in uu warbixin ka siiyo Hantidhawraha Guud wax kasta oo xad-gudub ama nidaam darro ah ee uu la kulmay intii uu ku gudo jiray gudashada hawlihiisa hantidhawrennimo.
   j) U sameeyo Hantidhawraha Guud warbixin kasta oo uu og yahay in ay been tahay ama aysan jirin sabab lagu aamini karo in ay run tahay, sida in la diiwaan-geliyo ama kharash bixin (warrant) qaldan.
   x) Si xun ama khaldan u isticmaalo xogta uu ogaaday marka uu fulinayo baarista hantidhawr ee xisaab kasta oo lagu xusay sharcigan.
   kh) Ku qalqaaliyo madaxa hay'adda dowladda, hantidhawraha gudaha ama sarkaalka dowladda in uu gaysto ama ka tago wax ficil ah oo ka mid ah mas'uuliyadiisa shaqo, inta ay ku guda jiraan gudashada waajibaadkooda shaqo ee lagu xusay sharcigan.
   d) Marka ka tagista ama geysashada ficilkaas ay sababayso lunsashada lacag Dowladeed, jebinta shuruuc maamul iyo dayacaadda danta Dowladda Federaalka
   r) Marka cid kasta oo ka tirsan Xafiiska Hantdhawraha Guud ee JFS ay si ula kac ah ugu tagrifasho awoodaha ku xusan Sharcigan (Abuse of Power).

Qodobka 33aad:
Ciqaabaha

1) Qof kasta oo lagu eedeeyo mid ka mid ah ama ka badan dembiyada ku xusan Qodobka 32aad ee Sharcigan laguna helo, waxa uu muteysanayaa in lagu xukumo ganaax ama xabsi ama labadooda oo wadajira, si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
2) Haddii qofka lagu riday xukun kama-dambeys ah, laguna helay dembi ah sharci jabin la xiriirta khiyaanada, gaabiska ama si-xun u adeegsiga la xiriirta maamulka lacagta Dowladda, Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu arrinta u wareejinayaa Xafiiska

Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka iyo hay'adaha kale ee fulinta sharciga, si ay uga qaadaan qaddarka lacagta ee lagu lunsaday khiyaanada, gaabiska iyo si-xun u adeegsiga, iyada oo ah hanti ay leedahay Dowladda Federaalka Soomaaliya.

CUTUBKA SIDEEDAAD:
KEYDIN, DHAQAN-GAL IYO ARRIMO KALE

Qodobka 34aad:
Kaydinta Warbixinta

Warbixinnada iyo natiijooyinka ka soo baxa baarista uu sameeyo Xafiiska Hantidhawrku waxaa lagu keydinayaa Qeybta Xog-dhowrka (archive) ee Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, waxaana loo kala saarayaa xogaha mid gaar ah oo aysan haboonoyn in ay gaarto Dadweynaha iyo Xog loogu tala galay Dadweynaha.

Qodobka 35aad:
Hantida Xafiiska

Dhammaan alaabta iyo hantida taala Xafiiska Hantidhawrka Guud waxaa ay ka mid tahay Hantida Dowladda, waxaana lagu maamulayaa xeerarka lagu dhaqo hantida Dowladda Federaalka.

Qodobka 36aad:
Xeer-nidaamiye

1) Hantidhawraha Guud ee JFS waxa uu sameynayaa Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan galinayo Sharcigan iyo hannaanka maamulka iyo hawl fulinta Xafiiska, kuwaas oo ay ka mid yihiin;
    b) Anshaxa iyo abaal-marinta shaqaalaha.
    i) Keydinta Dukumentiyada iyo xifdinta sirta xafiiska.
    j) Nidaamka Anshaxa Xafiiska Hantidhawrka JFS (Code of conduct).
    x) Habraaca gelidda heshiisyada la xiriira hawlaha Xafiiska.
2) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu soo saari karaa buugaag, tilmaamo iyo hab-raacyo, hadba marka loo baahdo, kuwaas oo si gaar ah oo faahfaahsan u caddeynaya mas'uuliyadda iyo shaqooyinka la xiriira fulinta Sharcigan iyo Xeernidaamiyeyaashiisa.
3) Wasiirka Maaliyadda ayaa u gudbinaya Xeer-nidaamiyaasha uu soo saaray Hantidhowrka Guud Golaha Wasiirada si ay u ansixiyaan, iyadoo la oggeysinayaa Guddiyada Maaliyadda ee Labada Aqal Baarlamaanka JFS. Xeer-nidaamiyaasha la ansixiyay waa in lagu daabacaa Faafinta Rasmiga ah.
4) Xeer-nidaamiyeyaasha lagu soo saaro Qodobkan Farqadiisa 1aad, waa in ay waafaqsanaadaan Sharcigan.

Qodobka 37aad:
Baabi'in

Sharcigan waxa uu baabi'inayaa Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin oo ku saabsan hawlaha hantidhawrka dalka, waxa uuna beddelayaa shuruucdii hore ee Hantidhawrka, gaar ahaan Sharciga lambarkiisu yahay 34 ee soo baxay 14/04/1972.

Qodobka 38aad:
Dhaqan-gal

Sharcigaani wuxuu dhaqan-gelayaa markii ay ansixiyaan Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

XEER MADAXWEYNAHA LR. 108

Taariikh: 20 Abriil 2023

CAFIS MADAXWEYNE

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/AG86/2023**, ku taariikheysan 17/04/2023, ujeedaduna ahayd Magacaabid Guddi Soo kormeera Xabsiyada Muqdisho iyo Xukunnada Maxaabiista.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka Xaaladda Xabsiyada iyo Maxaabiista Warqadda Ujeedadeedu ahayd Soo Gudbinta Liiska Maxaabiista soo buuxiyay Shuruudaha Cafiska, warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/996/2023**, ku taariikheysan 19/04/2023.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/AG92/2023**, ku taariikheysan 20/04/2023, kuna saabsan soo Jeedin Cafis Madaxweyne.

MARKUU ARKAY: Sharciga Xabsiyada Lr. 7 ee 30 Disembar 1972.

MARKUU GARWAAQSADEY: In maxaabiista cafiskan loo fidinaayo ay mudan yihiin in ay ka faa'ideystaan Cafis Madaxweyne si waafaqsan Sharciga.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan, waxaa loo fidiyay Cafis Madaxwayne Maxaabiista magacyadoodu hoos ku qoran yihiin kuwaas oo tiradoodu tahay **127** (**Boqol iyo Labaatan iyo Todobo**) **Maxbuus**, waxaana Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka la farayaa in laga siidaayo Xabsiyada ay maxaabiistaasi ku xiran yihiin.

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkan dhaqangelayaa marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Liiska Maxaabiista ay xukumeyn Maxkamadaha Rayidka ee ku xiran Xabsiga Guud ee Muqdisho (MPCC), buuxiyayna Shuruudaha Cafiska:-

Tr;	Magaca Maxbuuska	Magaca Hooyada	X. la xiray	Xukunka
1.	Axmed Adan Nuur	Ina Khadiijo Xasan	02/03/2021	3 sano
2.	C/Qaadir Siidow Cumar	Ina Maryan Maxamed	04/12/2020	3 sano
3.	Maxamed Cali Nuur	Ina Shamso Macalin	23/05/2021	3 sano
4.	Saciid C/Laahi Salaad	Ina Mako Cumar	04/02/2021	3 sano & 6 bil
5.	Maxamed Cusmaan Xasan	Ina Laylo Cali	15/07/2021	3 sano
6.	Liibaan Cumar Axmed	Ina Madiino Cabdi	18/07/2021	3 sano
7.	Bile Axmed Ciise	Ina Khadiijo Jiilaani	23/07/2021	3 sano
8.	Cabdi C/Laahi Maxamed	Ina Saciido Maxamed	21/03/2021	3 sano
9.	Nuur Maxamed Axmed	Ina Faadumo Cali	19/04/2021	3 sano & 6 bil
10.	C/Laahi Cumar Ibraahin	Ina Saynab Maxamuud	28/03/2021	3 sano
11.	Axmad Xaashi Yuusuf	Ina Faadumo Xuseen	24/10/2021	3 sano
12.	C/Laahi Maxamed Isaaq	Ina Abshiro Maxamed	08/05/2022	2 sano
13.	Ibraahim Cali Cadow	Ina Aamino C/Raxmaan	03/05/2022	2 sano
14.	Aadan Ibraahim Aadan	Ina Sangaabo Cali	28/04/2022	2 sano
15.	Muumin Aways Nuur	Ina Jamiilo Maxamed	23/03/2022	2 sano
16.	Ilyaas Saciid Saalax	Ina Khadiijo Ibraahim	19/03/2022	2 sano
17.	Axmed Siidow Mayow	Ina Xasno Cumar	05/02/2022	2 sano
18.	Mowliid Maxamuud Mataan	Ina Saynab Maxamuud	27/01/2022	2 sano
19.	Saalax Xasan Cabdulle	Ina Niimoone Nuur	18/01/2022	2 sano
20.	Qaasim Muuse Cali	Ina Maano Mukhtaar	09/01/2022	2 sano
21.	Daahir Cismaan Cabdulle	Ina Xaawo Cumar	22/11/2021	2 sano & 2 Bil
22.	C/Raxiim Maxamad Cabdi	Ina Sahro Yuusuf	13/12/2021	2 sano
23.	C/Risaaq Xasan Xuseen	Ina Abshiro Duhursey	13/12/2021	2 sano
24.	Maxamed Cali Maxamed	Ina Faadumo Xasan	22/05/2022	2 sano

XEER MADAXWEYNAHA LR. 108

Taariikh: 20 Abriil 2023

CAFIS MADAXWEYNE

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/AG86/2023**, ku taariikheysan 17/04/2023, ujeedaduna ahayd Magacaabid Guddi Soo kormeera Xabsiyada Muqdisho iyo Xukunnada Maxaabiista.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka Xaaladda Xabsiyada iyo Maxaabiista Warqadda Ujeedadeedu ahayd Soo Gudbinta Liiska Maxaabiista soo buuxiyay Shuruudaha Cafiska, warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/996/2023**, ku taariikheysan 19/04/2023.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/AG92/2023**, ku taariikheysan 20/04/2023, kuna saabsan soo Jeedin Cafis Madaxweyne.

MARKUU ARKAY: Sharciga Xabsiyada Lr. 7 ee 30 Disembar 1972.

MARKUU GARWAAQSADEY: In maxaabiista cafiskan loo fidinaayo ay mudan yihiin in ay ka faa'ideystaan Cafis Madaxweyne si waafaqsan Sharciga.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan, waxaa loo fidiyay Cafis Madaxwayne Maxaabiista magacyadoodu hoos ku qoran yihiin kuwaas oo tiradoodu tahay **127 (Boqol iyo Labaatan iyo Todobo) Maxbuus**, waxaana Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka la farayaa in laga siidaayo Xabsiyada ay maxaabiistaasi ku xiran yihiin.

4.	Maxamed Xasan Ibraahim Xasan	Ina Aamino Cismaan	20/11/2021	2 sano
5.	Ismaaciil C/Laahi Y,Are Shekh Ladiif	Ina Khadiijo Xaaji Aadan	27/12/2021	2 sano
6.	Maxamed Muuse Maxamuud	Ina Faadumo Yuusuf	25/01/2022	2 sano
7.	Shariif Cabdi Xaaji	Ina Xamsa Xaaji Cumar	12/12/2021	2 sano
8.	Xanaan Cabdiqaadir Jimcaale	Ina Sucdi Maxamed Maxamuud	31/05/2022	2 sano
9.	Xasan Basay Axmed	Ina Fadumo Maxamud Maxamed	24/09/2022	1 sano
10.	Najiib Xasan Macalin	Ina Mulki Maxamed	02/09/2022	1 sano
11.	C/Laahi Cismaan Maxamed Nuur	Ina Seynab C/Qaadir	21/09/2022	1 sano
12.	Maxamed Amiin Mahad Cabdulle	Ina Ikraam Aadan Daahir	06/08/2022	1 sano
13.	C/Salaam Axmed Macow (Faato)	Ina Waliyo Axmed Jabane	02/07/2022	1 sano & 4 bil
14.	C/Casiis C/Fataax Cisman	Ina Xabiibo Maxamed Axmed	16/08/2022	1 sano
15.	Haaruun C/Qaadir Cismaan	Ina Bishaaro Cismaan Iidow	16/08/2022	1 sano
16.	Xasan Kaafi Cabdi Cali (Qooste)	Ina Farxiyo Sh Nuur	23/10/2022	1 Sano
17.	C/Majiid Maxamed Xuseen	Ina Faadumo Cali Nuur	01/09/2022	1 sano
18.	Ismaaciil Xuseen Cali	Ina Binti Qeylshe Jimacaale	27/08/2022	1 sano
19.	C/Rashiid Maxamed Cali	Ina Shariifo Xuseen Samow	12/09/2022	1 sano
20.	Muxiyadiin Yare Cali Cismaan	Ina Faadumo Abuukar Xasan	07/11/2022	1 sano
21.	Sharmaarke C/Laahi Axmed	Ina Faadumo Xuseen Cabdulle	16/08/2022	1 sano
22.	Khaalid Cali Cumar	Ina Xaliimo Cali Garabey	16/08/2022	1 sano
23.	Salaad Cismaan C/Laahi	Ina Aamino Maxamed Axmed	30/08/2022	1 sano
24.	Mahad Cumar Xasan	Ina Sahro Xasan Cali	25/05/2022	1 sano
25.	Hanad Maxamed Cabdi	Ina Asli Warsame Cali	24/09/2022	1 sano
26.	Xasan Cumar Cali	Ina Faadumo Cali Dayib	18/10/2022	9 bilood
27.	C/Risaaq Cabdi Ibraahim	Ina Faadumo C/Laahi Maxamuud	27/11/2022	9 bilood
28.	C/Qani Maxamed Aadan	Ina Safiya C/Laahi Maxamed	22/11/2022	9 bilood
29.	C/Naasir C/Qaadir Axmed	Ina Dahabo Maxamuud	22/11/2022	9 bilood
30.	C/Najiib Cumar Axmed	Ina Muraayo Xasan Jaamac	22/11/2022	9 bilood
31.	C/Shakuur Xuseen Cabdulle	Ina Canab Cabdi Ciise	22/11/2022	9 bilood
32.	C/Salaam Daahir Maxamed	Ina Samsam Cali Murasal	22/11/2022	9 bilood
33.	C/Laahi Maxamuud Maxamed	Ina Suldaano Axmed Maxamuud	11/10/2022	9 bilood
34.	C/Qaadir Carabow Maxamuud	Ina Raxmo Nuur Xiirey	28/10/2022	9 bilood

35.	Maxamed Cabdi Yuusuf (Kuulow)	Ina Laylo Xasan Maxamed	03/12/2022	7 bilood
36.	Maxamed C/Laahi Maxamed Shine	Ina Xabiibo Musdhaf Maxamed	03/12/2022	7 bilood
37.	Maxamed Cabdi Cali Ganey	Ina Sacdiyo Aadan Warsame	03/12/2022	7 bilood
38.	Ibraahim Tahliil Xasan (Salimbi)	Ina Cayni Qasaali Xuseen	03/12/2022	7 bilood
39.	Maxamed Cali Maxamed	Ina Xaliimo Maxamed Xasan	01/01/2023	6 bilood
40.	Yaasiin Xasan Muuse	Ina Saynab Abuukar Caraale	08/01/2023	6 bilood
41.	Maxamed Nuur Geele Jabiiba	Ina Sahra Cabdulle Maxamed	29/12/2022	6 bil & $60
42.	C/Fataax C/Laahi Xasan	Ina Raaxo Cisman Calasow	09/01/20213	6 Bilood

Liiska Maxaabiista ay Xukuntay Maxkamadda Ciidamada Qalabka ee ku xeran Xabsiga Dhexe ee Xamar iyo Xabsiga Guud ee Muqdisho (MPCC), buuxiyayna Shuruudaha Cafiska: -

Tr;	Magaca Maxbuuska	Magaca Hooyada	Tr laso xiray	Xukunka
1.	Faarax Nuur Cabdi	Mako Xasan Juun	28/06/2021	3 Sano
2.	Cabdi Raage Max'ud	Saynab Max'ud Cosobow	28/06/2021	3 Sano
3.	C/risaaq Axmed Xuseen	Dhoofo Aadan Daahir	17/07/2021	3 Sano
4.	Max'ed Shire Aadan Buule	Xaliimo Axmed Aadan	22/05/2022	2 Sano
5.	Xuseen Sheekh Cabdi Dhurow	Owliyo Sheekh Xuseen	10/11/2021	2 Sano
6.	Xasan Iidow Cali	Daahiro C/Laahi Ibraahim	06/07/2022	1 Sano
7.	Bishaar C/fitaax Cumar	Faadumo Xade Muxumed	26/11/2022	1 Sano
8.	Max'ed Abuukar Jimcaale Salaad	Faadumo Xasan Max'ed	16/08/2022	1 Sano
9.	Cabdi Tuuryare Cali	Sahro Xasan Jimcaale	11/11/2022	1 Sano
10.	Cali Cabdi Cilmi	Xabiibo Max'ed Hufane	11/11/2022	1 Sano
11.	C/qafaar Bishaar Xasan Buraale	Nasro Gaarane C/Laahi	11/11/2022	1 Sano
12.	Qadar Cadaawe Max'ed	Barwaaqo Aadan Isaaq	11/11/2022	1 Sano
13.	Shukri Max'ed Axmed Cabdi	Calaso Cabdi Faarax	11/11/2022	1 Sano
14.	Bashiir Max'ud Xaashi (Qalbi dhagax)	Istaahil Xirsi Cali	11/11/2022	1 Sano
15.	Max'ed Nuur Barrow Nuunow	Aamino Max'ed	11/11/2022	1 Sano
16.	Max'ed Cali Max'ed C/raxmaan	Xaawo Aadan Bashiir	11/11/2022	1 Sano
17.	Aadan Axmed Max'ed	Shamhaad C/Kariin Xasan	11/11/2022	1 Sano
18.	Max'ed Daa'uud Cumar	Sahro Cismaan Cali	11/11/2022	1 Sano

19.	Nuur Kulane Cabdi Caanood	Barey Muxumed Macow	11/11/2022	1 Sano
20.	C/laahi C/nuur Max'ed Isaaq	Deeqo Khaliif Dhoore	11/11/2022	1 Sano
21.	Max'ed C/laahi Max'ud Cismaan	Timiro Yuusuf Cabdi	11/11/2022	1 Sano
22.	Xuseen Axmed Kheyre Tobanle	Sixmo Cali Alkaaf	11/11/2022	1 Sano
23.	Max'ed C/naasir Axmed	Deeqo Axmed Xaashi	11/11/2022	1 Sano
24.	Axmed Cali Cismaan	Faadumo Cali Muuse	11/11/2022	1 Sano
25.	Axmed Yuusuf Cali	Maryan Max'ed Yuusuf	11/11/2022	1 Sano
26.	Salmaan Aadan C/laahi Nuur (isfiiilito)	Xaawo Diinow Cumar	11/11/2022	1 Sano
27.	Ayuub Axmed Cabdi	Qadro Axmed Cali	11/11/2022	1 Sano
28.	Aadan C/laahi Aadan (Ashidanti)	Farxiyo Muxumed Macalin	11/11/2022	1 Sano
29.	Asad C/qaadir Muuse	Roodo Faarax Axmed	22/11/2022	1 Sano
30.	Axmed C/laahi Max'ed	Sahro Max'ed Abuukar	20/01/2023	1 Sano
31.	Yaxye Axmed Xasan	Xasno Tuuryare Cabdulle	19/01/2023	1 Sano
32.	Saadaam Max'ed Xuseen	Faadumo Abiikar Barrow	13/12/2022	1 Sano
33.	Max'ud C/wali Max'ud	Xaliimo Cali Warsame	13/12/2022	1 Sano
34.	C/fitaax Max'ed Cabdi	Falis Max'ud Warsame	13/12/2022	1 Sano
35.	Max'ed Cabdi Max'ud Yuusuf (Sheelare)	Deeqo Cumar Max'ud	23/08/2022	1 Sano
36.	Xasan Axmed Mahdi Macalin (Seylaani)	Cabdiyo Cali Max'ed	12/02/2023	1 Sano
37.	Ugaas Maalin Gaabow Aadan	Hodan Guudow Macalin	12/12/2022	6 Bilood
38.	Cali Xuseen Culusow (Cali Cadde)	Xaliimo Cali Afrax	08/02/2023	6 Bilood
39.	Xasan Axmed Socdaal (Xasan Quutax)	Hindiyow Max'ed Baaruud	08/02/2023	6 Bilood
40.	Ibraahim Max'ud Fiidow	Kaltuumo Culusow Max'ud	08/02/2023	6 Bilood
41.	Max'ed Axmed Cali (Eelaayow)	Awliyo Max'ed Sh. Xuseen	26/12/2022	6 Bilood
42.	Axmed Cabdi Xasan	Nuurto Cali Muqtaar	19/02/2023	6 Bilood
43.	Khaalid Max'ed Baashi	Xaawo Saciid Karaama	14/02/2023	6 Bilood

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO :
TAARIIKH :
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Cu...
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.105

TAARIIKH: 09 ABRIIL 2023

WAREEJIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Sharciga Naba-psugidda iyo Sirdoonka Qaranka ee soo baxay 2023.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Ku-Simaha Wasiirka ahna Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha, warqada sumadeedu tahay **WAG/XWG/75/22** ee ku taariikheysan **25/12/2022**, kuna saabsan codsi wareejin sarkaal.

MARKUU TIXGALIYEY: Baahida loo qabo in sarkaalkan loo wareejiyo Ciidanka Boliiska Soomaaliya.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay loo wareejiyey Ciidanka Booliska Soomaaliyeed isaga oo ka tirsanaa Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka.

Lr.	Darajo	Magaca
1.	G/le	Axmed Cali Cumar Cali

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S_saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO :
TAARIIKH :
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guta
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.106 **Taariikh: 09 Abriil 2023**

MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qoddobka 90aad Xarafka 'b' iyo 87aad ee Dastuurka Kumeel Gaarka ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr.49 ee soo baxay 1970, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Warqada summadeedu tahay WC&AD/XW/299/04/23, ee ku taariikheysan 03/04/2023, ee soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, kuna saabsan Soo-jeedin Magacaabis Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiiradda ee summadiisu tahay SHGW.00.28.04.23 ee ku taariikheysan 06/04/2023 iyo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S ee summadeedu tahay XRW/0130/04/23, kuna taariikheysan 06/04/2023, kuna saabsan Go'aan-Gole Ansixinta Magacaabidda Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in la magacaabo Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliya.

MARKU U TIXGALIYEY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Sarkaalka xilkan loo magacaabayo.

Waxaa uu Madaxweynuh u soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa **S/Guuto Mahad Cabdiraxmaan Aadan** loo magacaabay in u noqdo Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliya.

Qodobka 2aad

xeerkaani wuxuu baabi 'inayaa wixii xeer ah ee ka horeeyey, kana hor imaanaaya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxaa uu dhaqan galayaa marka uu saxii.xo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO :
TAARIIKH :
SAXIIX :
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 107 **Taariikh: 17 Abriil 2023**

MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE CARRUURTA IYO XUQUUQDA SOO GALOOTIGA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay Marwada loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Ergayga Gaarka ah ee Carruurta iyo Xuquuqda Soo-Galootiga .

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay **Maryan Yaasiin Xaaji Yuusuf** in ay noqoto Ergayga Gaarka ah ee Carruurta iyo Xuquuqda Soo- Galootiga.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynanaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya , waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO :
TAARIIKH :
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gu...
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.109
WAREEJIN XEER-ILAALIYAYAAL

TAARIIKH: 19 Abriil 2023

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Warqadda Sumadeedu tahay **XXIG/AG61/2023**, ku taariikheysan 21/03/2023, kana soo baxday Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka Ujeedaduna tahay Soo Jeedin Wareejin Xeer-Ilaaliyayaal

MARKUU TIXGELIYAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in loo wareejiyo wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa loo wareejiyay Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha Mudanayaasha Magacyadoodu hoos ku xusan yihiin.

Tr.	Magaca
1.	Khaalid Xasan Nuur
2.	Yuusuf C/raxmaan Abuubakar
3.	Amal Cumar Macallin
4.	Cali Cismaan Axmed
5.	C/raxmaan C/laahi Maxamed
6.	Nuur Axmed Cismaan
7.	Maryan Macalin Axmed
8.	Axmed C/laahi Maxamed

Qodobka 2aad

Wixii Xuquuq waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Lr. 11 ee 05/12/2006 ee Shaqaalaha Rayidka.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan Dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HANO94/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guu
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNAHA LR. 110

Taariikh: 23 Abriil 2023

CAFIS MADAXWEYNE

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/AG94/2023**, ku taariikheysan 20/04/2023, kuna saabsan soo Jeedin Cafis Madaxweyne.

MARKUU ARKAY: Sharciga Xabsiyada Lr. 7 ee 30 Disembar 1972.

MARKUU GARWAAQSADEY: In maxaabiista waqtiga dheer u xukuman burcad badeednimadu ay mudan yihiin in ay ka faa'ideeystaan Cafis Madaxweyne si waafaqsan Sharciga.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan, waxaa loo fidiyay Cafis Madaxwayne Maxaabiista magacyadoodu hoos ku qoran yihiin kuwaas oo tiradoodu tahay **8 (Sideed) Maxbuus**, waxaana Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka la farayaa in laga siidaayo Xabsiyada ay maxaabiistaasi ku xiran yihiin.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkan dhaqan gelayaa marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

Tr;	Magaca Maxbuuska	Taariikhda la Xiray	Mududada uu qaatay	Xukunka
1.	Xuseen Axmed Maxamed	20/04/2011	16 Sano	24 Sano
2.	Shaafici C/laahi Cali	20/04/2011	16 Sano	24 Sano
3.	Cali Maxamed Cali	29/03/2010	17 Sano iyo 4 Bil	22 Sano
4.	Bashiir Xasan Cali	29/03/2010	17 Sano iyo 4 Bil	22 Sano
5.	Hayaan Cumar Sabriye	06/03/2012	14 Sano iyo 6 Bil	18 Sano

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia

6.	Cabdi Axmed Faarax	22/11/2010	17 Sano	20 Sano
7.	Salaad Maxamed Diiriye	29/03/2010	17 Sano iyo 4 Bil	22 Sano
8.	C/qaadir Xaashi Cawaale	29/03/2010	17 Sano iyo 4 Bil	22 Sano

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAHA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/09/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse [illegible]
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 111 **Taariikh: 23 Abriil 2023**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AG/XW/1286/04/2022**, ku taariikheysan **21/04/2022**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. C/xakiin Nuur Maxamed.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. C/xakiin Nuur Maxamed** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. C/xakiin Nuur Maxamed** ka howl galayaa Gobolka Benaadir gaar ahaan magaalada Muqdishu.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO :
TAARIIKH :
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guu...
Hantidhawraha Guud ee Xarafka

Madaxweynaha J. F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNAHA LR.112 **TAARIIKH: 29 Abriil 2023**

OGGOLAANSHO SHAQO-SII-WADID GUDDOOMIYAHA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxwayne Lr. 130 ee soo baxay 22/04/2012 kuna saabsan Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed iyo Hey'adaha Maaliyadda Soomaaliya.

MARKUU OGAADAY: In ay laga maarmaan tahay in shaqada loo cusbooneysiiyo Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha saxiixo xeerkaan, waxaa Mudane **Cabdiraxmaan Maxamed Cabdullaahi** loo oggolaaday in uu sii wato shaqadiisa muddo **90** (**Sagaashan**) **maalin ah**, taas oo ka bilaabanayso **20 Abriil 2023 illaa 18 Luuliyo 2023**.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAHA GUUD
DIIWAAN NO : HANO931/2023
TAARIIKH : 29/04/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gu...
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNAHA LR. 113 **TAARIIKH: 30 Abriil 2023**

MAGACAABIS XISAABIYAHA GUUD ee DOWLADDA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKA UU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Soo Jeedinta Ra'iisul-Wasaaraha warqadda summadeedu tahay **XRW/0136/04/2023** ee soo baxday taariikhda markay ahayd **27 Abriil 2023**, kuna saabsan Go'aan gole " Ansixinta Soo-Jeedinta Magacaabista Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Anas.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGALIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan,waxa uu u magacaabay **Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Anas** in uu noqdo **Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.**

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/0 22/2023
TAARIIKH : 2-5/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Dalanka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 115

Taariikh: Maajo 14, 2023

MAGACAABIS LATALIYAHA MADAXWEYNAHA EE XAKAMEYNTA QULQULKA HUBKA SHARCI DARRADA AH

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay marwada loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Lataliyaha Madaxweynaha ee xakameynta qulqulka hubka sharci darrada ah.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay **Maka Maxamuud Muuse** in ay noqoto Lataliyaha Madaxweynaha ee xakameynta qulqulka hubka sharci darrada ah.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/09/2023
TAARIIKH : 24/04/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gu...
Hantidhawraha Guud ee Qaran...

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

TAARIIKH: 25 MAAJO 2023

XEER MADAXWEYNE LR. 118
DALLACSIIN L/SARAAKIIL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 ,. kuna saabsan Dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed .

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda sumadeedu tahay **XTC/XDS/2367/22** , kuna taariikheysan **02/10/22,** kuna saabsan codsi dallacsiin L/Saraakiil.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo L/Saraakiishan.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa L/saraakiisha Magacyadoodu hoos ku qoran yihiin loo dallacsiiyay mid kasta darajada ku hor qoran iyaga oo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed:

Tirsi	Darajada	N.ciidan	Magaca	U dallacay
1.	L/Sarkaal	X 37431	Ciise Maxamed Cabdullaahi	Dhamme
2.	L/Sarkaal	X 24241	Saciid Cabdullaahi Cumar	L/X/le
3.	L/Sarkaal	X 36851	Cabdishakuur Maxamed Xasan	L/X/le
4.	L/Sarkaal	X 36852	Maxamed Cusmaan Muuse	L/X/le
5.	L/Sarkaal	X 36861	Yaxye Cilmi Barre	L/X/le

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxa ay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ee uu sharciga oggol yahay.

Qodobka 3 aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : Hanh 89/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE Lr.116

Taariikh: Juun 11, 2023

DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad , Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.15 ee 06/04/1960 Kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo sarkaalkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobk,a 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran.

Lr.	Darajo	Magaca	U Dallacay
1.	G/Sare	Axmed Cabdulaahi Axmed	S/Guuto

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxw.aynaha J.F.S saxiixo , waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HHG/090/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 119
DALLACSIIN SARKAAL

TAARIIKH: 25 MAAJO 2023

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 , kuna saabsan Dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed .

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda sumadeedu tahay **XTC/XDS/606/19** , kuna taariikhaysan 1**2/06/19,** kuna saabsan codsi dallacsiin Sarkaal.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo sarkaalkan.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalkan Magaciisu hoos ku qoran yahay loo dallacsiiyay darajada ku hor qoran isaga oo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed:

Tirsi	Darajada	Magaca	U dallacay
1.	G/le Sare	Maxamed Macallin Cali Maxamed	S/guuto

Qodobka 2aad

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ee uu sharciga oggol yahay.

Qodobka 3 aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAHA GUUD
DIIWAAN NO : HGG/0838/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guteh
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE Lr.120A **TAARIIKH: 01 Juun 2023**

SOO WAREEJIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.003 ee soo baxay 08/03/2023, kuna saabsan dhismaha Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu sarkaalkan mudan yahay in loo soo wareejiyo Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay oo ka tirsanaa Ciidanka Booliska Soomaaliyeed loo soo wareejiyay Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

Lr.	Darajo	Magaca
1.	G/le	Cabdullaahi Xuseen Guuleed

Qodobka 2aad

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/0837/2023
TAARIIKH: 29/10/2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.120B **TAARIIKH: 01 Juun 2023**

DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 003 ee soo baxay 08 Maarso 2023, kuna saabsan Dhismaha Hey'adda Sirdoonka & Nabad Sugidda Qaranka.
MARKA UU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu sarkaalkan mudan yahay in la dallacsiiyo .

Waxaa uu Madaxweyhuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1ad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalka uu magaciisu hoos ku qoran yahay loo dallacsiiyey derajada ku hor qoran isaga oo ka mid ah Hey'adda Sirdoonka & Nabad-sugidda Qaranka.

TIRSI	DERAJO	MAGACA	U DALLACAY
1.	G/le	Cabdulaahi Xuseen Guuleed Cosoble	G/le Dhexe

Qodobka 2aad

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu u oggol yahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAHA GUUD
DIIWAAN NO : HHG/026/2023
TAARIIKH : 26/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.123

Taariikh: 17 Juun 2023

MAGACAABID GUDDOOMIYAHA iyo GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA HEY'ADDA QAXOOTIGA iyo BARA-KACAYAASHA QARANKA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: MARKUU ARKAY: MARKUU ARKAY:

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, xarafka 'k'ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr.2 ee 21/02/2016, dhismaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay XRW/157/06/2023, ku taariikheysan 08/06/2023, kuna saabsan Go'aan Gole Ansixinta Magacaabidda Guddoomiyaha iyo Ku- Xigeennada Hey·adda Qaxootiga iyo BaraKacayaasha Qaranka.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay WAGF&D/XW/0665/2023, taariikheysan 08/06/2023, kuna saabsan Soo-Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-U-Heshiisiinta ee Magacaabidda Guddoomiyaha iyo Ku-Xigeennada Hey'adda Qaxootiga iyo Bara- Kacayaasha Qaranka.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay laga maarmaan tahay in la magacaabo Guddoomiyaha iyo Ku-Xigeenn.ada Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-Kacayaasha Qaranka.

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leyihiin Guddoomiyah.a iyo Ku-Xigeennada loo magacaabayo xilkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan waxa uu magacaabay:

a. Marwo Safiya Xasan Maxamed in ay noqoto Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka.

b. Md. Cabdullaahi Aadan Cabdi in uu noqdo Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad ee Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka.
c. Md. Maxamed Cabdulaahi Salaad in uu noqdo Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka.

Qodobka 2aad

Xeerkani waxa uu baabi'nayaa wixii xeer ah ka horreeyay kana hor imanaya.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa faafinta rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAKA GUUD
DIIWAAN NO : HAG/0858/2023
TAARIIKH : 26/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guta...
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE LR.124 **Taariikh: 17 Juun 2023**

MAGACAABID MAAREEYAHA GUUD iyo KU-XIGEENKA MAAREEYAHA GUUD EE HEY'ADDA AQOONSIGA IYO DIIWAAN GELINTA DADWEYNAHA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, xarafka 'k'ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Sharci Lr.009 ee 20/03/2023, Sharciga Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwan Gelinta Dadweynaha.
MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay XRW/156/06/2023, ku taariikheysan 08/06/2023, kuna saabsan Go'aan Gole Ansixinta Magacaabidda Maareeyaha Guud iyo Ku- Xigeenka Maareeyaha ee Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwan Gelinta Dadweynaha.
MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay WAGF&D/XW/0666/2023, taariikheysan 08/06/2023, kuna saabsan, Soo-Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-U-Heshiisiinta ee Magacaabidda Maareeyaha Guud iyo Ku-Xigeenka Maareeyaha ee Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwan Gelinta Dadweynaha.
MARKUU GARWAAQSADAY: In ay laga maarmaan tahay in la magacaabo Maareeyaha Guud iyo Ku- Xigeenka Maareeyaha ee Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwan Gelinta Dadweynaha.
MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin Maareey ha iyo Ku-Xigeenka loo maaacaabavo xilkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay:

a. **Md. Cabdiweli Cali Cabdulle (Timacade)** in uu noqdQ Maareeyaha Guud ee Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwan Gelinta Dadweynaha.
b. **Md. Cabdullaahi Biixi Xuseen** in uu noqdo Maareeye Ku-Xigeenka ee Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwan Gelinta Dadweynaha.

Qodobka 2aad

Xeerkani waxa uu baabi'nayaa wixii xeer ah ee ka horreeyay, kana hor imanaya.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu Soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HA/0811/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Ontiele
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE LR.125 **TAARIIKH: 19 Juun 2023**

MAGACAABIS MADAXA XARUNTA DHAQAN-CELINTA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka.
MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka.
MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.
Marka uu Tixgeliyay: Baahida loo qabo magacaabista Madaxa Xarunta Dhaqan-Celinta Soomaaliya.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan, waxa uu u magacaabay Mudane Musa Guled Ashkir in uu noqdo Madaxa Xarunta Dhaqan-Celinta Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Xeerkani waxa uu baabi'nayaa wixii xeer ah ka horreeyay kana hor imanaya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka. Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAKA GUUD
DIIWAAN NO: HHA/093/2023
TAARIIKH: 29/10/2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Guti
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE LR.126 **Taariikh: 19 Juun 2023**

MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA LUGTA/DHULKA EE CIIDAANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay muhiim tahay in la magacaabo Taliyaha cusub ee Lugta/Dhulka ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Waxaa S/Guuto Axmed Aadan Cali loo magacaabav in uu noqdo Talivaha Ciidanka Lugta/Dhulka ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Xeerkani waxa uu baabi'nayaa wixii xeer ah ka horreeyay kana hor imanaya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaallsa Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAKA GUUD
DIIWAAN NO : HGW/0322/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guuleed
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.127 **TAARIIKH: 19 Juun 2023**

MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA & XIL KA QAADIS TALIYIHII HORE EE CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka.
MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka.
MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed.
MARKUU GARWAAQSADAY: In ay muhiim tahay in la magacaabo Taliyaha cusub ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya xilkana laga qaado Taliyihii hore ee Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliya.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan Waxaa S/Gaas Odawa Yusuf Raage laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Waxaa S/Guuto Ibraahim Sheekh Muxidiin loo magacaabay in uu noqdo Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : H0010 5/1/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guu...
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE Lr.128 **Taariikh: 05 Luuliyo 2023**

WAREEJIN IYO KU QAADASHO DARAJO

MADAXWEYNAHA J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhiga, warqadda summadeedu tahay WG/XW/000336/07/23 kuna taariikheysan 02/07/2023, kuna saabsan soo wareejin sarkaal.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu mudan yahay in la soo wareejiyo laguna qaato darajada hoos ku xusan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay loo wareejiyey Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed laguna qaatay darajada ku hor qoran, isaga oo ka tirsanaa Ciidanka Daraawiista ee Maamul Goboleedka Koonfur Galbeed.

Lr.	Magaca	Darajada
1.	Yuunis Aadan Xasan	Gaashaanle

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S Saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/1080/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gut...
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.129 **TAARIIKH : 19 JUUN 2023**

DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo sarkaalkan. Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan , waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran.

Lr.	Darajo	Magaca	U Dallacay
1.	S/Guuto	Ibraahim Sheekh Muxidiin	S/Gaas

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/079/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guteh
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.130 **Taariikh: 16 Luuliyo 2023**

DIB U MAGACAABIS GUDOOMIYAHA BANGIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, faqradda 1aad, xarafka 'C' iyo faqradda 2aad ee Dastuurka KMG ah e J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qoddobka 90aad , xarafka 'K' ee Dastuurka J.F .S.

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxweyne Lr.130 ee soo baxay 22/04/2012 kuna Saabsan Sharciga Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed iyo Hey'addaha Maaliyada Soomaaliya.

MARKUU OGAADAY: In ay laga maarmaan tahay in shaqada loo cusboonaysiiyo Gudoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Gudoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 19 Abriil 2023 waxa mudane Cabdiraxmaan Maxamed Cabdullahi dib loogu magacaabay inuu sii ahaado Gudoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya , siina wato shaqadiisa muddo 4 sanadood ah.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxaa uu burinayaaa Xeer Lr.112.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HGG/079/2023
TAARIIKH : 29/04/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE LR.131 **Taariikh: 16 Luuliyo 2023**

MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE HEY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qoddobka 90aad Xarafka 'b' iyo 87aad ee Dastuurka Ku-meel Gaarka ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharci Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, Sharci Lr.012 ee soo baxay 20/03/2023, Qoddobka 15aad faqraddisa 1aad oo tilmaamaya Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hey'adda.

MARKU U ARKAY: Warqada summadeedu tahay WAG/XW/265/23, ee ku taariikheysan 12/07/2023, ee soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha, kuna saabsan Soo-jeedin Magacaabis Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiiradda ee summadiisu tahay SHGW.00.38.07.23 ee ku taariikheysan 13/07/2023 iyo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S ee summadeedu tahay XRW/173/07/23 kuna taariikheysan 13/07/2023, kuna saabsan Magacaabid Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in la magacaabo Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliya.

MARKU U TIXGALIYEY: Aqoonta iyo waayo aragnimada uu leeyahay mudanaha xilkan loo magacaabayo.

Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa Mudane Axmed Siciid Maxamed loo magacaabay in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Hey'adda.Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliya.

Qodobka 2aad

xeerkaani wuxuu baabi'inayaa wixii xeer ah ee ka horeeyey, kana hor imaanaaya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxaa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaal ka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAHA GUUD
DIIWAAN NO : HHW/0771/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA LR.132 **Taariikh: Luuliyo 18, 2023**

MAGACAABISTA KU-SIMAHA TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BADDA IYO ILAALADA XEEBAHA & XIL KA QAADIS TALIYIHII HORE EE CIIDANKA BADDA IYO ILAALADA XEEBAHA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

Markuu arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad. Xarfaha 'a ', b ' iyo c ' Iyo faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

Markuu arkay: Qodobka 90aad , Xarfaha ' b ' iyo ' c ' ee Dastuurka J.F.S.

Markuu arkay: Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Markuu garwaaqsaday: In ay muhiim tahay in la magacaabo Ku-Sime cusub oo uu yeesho Ciidanka Badda iyo ilaalada xeebaha.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Waxaa G/le Cabdiwaaxid Cali Afrax loo magacaabay in uu noqdo Ku-Simaha Taliyaha Ciidanka Badda iyo ilaalada xeebaha.

Qodobka 2aad

Waxaa G/Sare Mubaarak Cabdiqani Muuse laga qaaday xilkii taliyaha ciidanka badda iyo ilaalada xeebaha.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah e J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : Hanw076/2023
TAARIIKH : 19/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guled
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE LR. 133 **Taariikh: 22 LUULIYO 2023**

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA EE ARRIMAHA QURBO-JOOGTA YURUB

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir La-Taliye Madaxweyne ee arrimaha qurbo-joogta Yurub.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan , waxa uu mudane Daahir Xuseen Cali u magacaabay in uu noqdo La-Taliyaha Arrimaha Qurbo-Joogta Yurub ee Madaxweynaha J.F.S.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya , waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAHA GUUD
DIIWAAN NO : HHH/113/2023
TAARIIKH : 24/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE Lr.134 **Taariikh: 23 Luuliyo 2023**

WAREEJIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.003 ee soo baxay 08/03/2023, kuna saabsan dhismaha Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed, warqada sumadeedu tahay XTCB/21/51/2023 kuna taariikheysan 16/07/2023, kuna saabsan soo wareejin sarkaal.

MARKUU TIXGALIYEY: Baahida loo qabo in sarkaalkan loo wareejiyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay loo wareejiyey Ciidanka Booliska Soomaaliyeed isaga oo ka tirsanaa Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

Lr.	Darajo	Magaca
1.	Dhamme	Cabdi Ibraahim Xasan

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAHA GUUD
DIIWAAN NO : HAG/1121/2023
TAARIIKH : 23/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Cusmaan
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.135 **TAARIIKH:01da AGOOSTO 2023**
MAGACAABIS TALIYE KU-XIGEENKA CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKA Y: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 49 ee soo baxay 1970, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliya warqadda Summadeedu tahay **T/G/C.A.S/T/G/218/2023,** kuna taariikheysan 31da Luuliyo 2023, ujeedaduna tahay Codsi magacaabis Taliye Ku-Xigeenka Asluubta Soomaaliya.

MARKUU TIXGALIYEY: Baahida loo qabo in Ciidanka Asluubta Soomaaliya loo magacaabo Taliye Ku-Xigeen.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu xeerkaan saxiixo Madaxwaynaha J.F.S waxaa **S/Guuto Cilmi Wasuge Colow** loo magacaabay in uu noqdo Taliye Ku-Xigeenka Ciidanka Asluubta Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu burinayaa wixii xeer ah ee ka horreeyay kana hor imaanaya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliva. waxaana lagu soo saari doonaa Faafi.nta Rasmiga ah ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERA... SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAW... GUUD
DIIWAAN NO : HHN/111/2023
TAARIIKH : 31/01/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 136 **TAARIIKH: Agoosto 15, 2023**

MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA J.F.S.

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad Dastuurka KMG ah *ee* J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Agaasime Guud ee ay yeelato Madaxtooyada J.F.S.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan, waxa uu u magacaabay Mudane Cabdixakiim Maxamed Yuusuf in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada J.F.S.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/112/2023
TAARIIKH : 24/11/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE LR. 137 **TAARIIKH: 17 Sebteember 2023**
DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka Ku-Meel Gaar ah J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliya.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo sarkaalkan.

Waxaa uu Madaxweyhuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran, isagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Tr.	Darajo	Magaca	U Dallacay
1.	G/Dhexe	Dayax Cabdi Cabdulle	G/Sare

Qodobka 2aad

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggol yahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HHG/1082/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 138 **TAARIIKH: 18 SEBTEEMBER 2023**

XIL KA-QAADISTA TALIYE KU-XIGEENKII HORE ee CXDS IYO MAGACAABIS TALIYE-KU-XIGEENKA CUSUB ee CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad. Xarfaha 'a ', ' b ' iyo ' c ' Iyo faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarfaha ' b ' iyo ' c ' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay muhiim tahay in la magacaabo Taliye Ku-Xigeenka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Waxaa uu Madaxweyhuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **S/Guuto Cabbaas Amiin Cali** laga qaaday xilkii Taliye Ku-Xigeenka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Waxaa **S/Guuto Nuureey Maadeey Sheekh** loo magacaabay Taliye Ku-Xigeenka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/107/2023
TAARIIKH: 29/10/2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE LR.139 **TAARIIKH: 18 SEBTEEMBER 2023**

XIL KA-QAADIS TALIYIHII CIIDANKA LUGTA/DHULKA HORE ee CXDS & MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB ee CIIDANKA LUGTA/DHULKA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad. Xarfaha 'a ', ' b ' iyo ' c ' iyo faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarfaha ' b ' iyo ' c ' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay muhiim tahay in la magacaabo Taliyaha Ciidanka Lugta/Dhulka ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Waxaa uu Madaxweyhuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **S/Guuto Axmed Aadan Cali** laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidanka Lugta/Dhulka ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Waxaa **G/Sare Dayax Cabdi Cabdulle** loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Lugta/Dhulka ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : Han/106/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Iese Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 140 **TAARIIKH: 5 OKTOOBAR 2023**

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE ARRIMAHA DIB-U-HESHISIINTA IYO DASTUURKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir La-Taliye Sare Madaxweynaha ee arrimaha Dib-U-Heshisiinta iyo Dastuurka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu **Dr. Cabdiraxmaan Cabdullaahi Baadiyow** u magacaabay in uu noqdo La-Taliye Sare ee Dib-U-Heshisiinta iyo Dastuurka ee Madaxweynaha J.F.S.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeerkan lagu baabi'iyay xeer kasta oo ka hor imaanaayo, kana horreeyay.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HG/105/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER LR.141 **TAARIIKH: 24 SEBTEEMBER 2023**

MAGACAABIS GOLAHA MAAMULKA SARE EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKA UU ARKAY: Qodobka **87aad** ee Dastuurka KMG ah ee Dalka.

MARKA UU ARKAY: Qodobka **90aad** ee Dastuurka KMG ah ee Dalka.

MARKA UU ARKAY: **Sharci Lr. 24** ee soo baxay **24-kii Febraayo 2020**, kuna saabsan sharciga istaatistika Qaranka.

MARKA UU ARKAY: Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha xukuumadda Federaalka Soomaaliya warqadda summadeedu tahay **XRW/183/07/2023,** kuna taariikhaysan **03/08/2023**, kuna saabsan Magacaabis Golaha Maamulka Sare ee Hey'adda Istaatistikada Qaranka.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin xubnaha loo magacaabayo xilalkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in Hey'adda Istaatistikada Qaranka loo magacaabo Golaha Maamulka sare ee Hey'adda.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu magacaabay Golaha Maamulka Sare ee Hey'adda Istaatistikada Qaranka oo kala ah:

1. Cabdi Axmed Cusmaan
2. Maxamed Qaasim Maxamuud
3. Xabiibo Sheekh Aadan Maxamed
4. Cumar Cali Maxamed
5. Axmed Xasan Ismaaciil
6. Guuleed Cusmaan Maxamed
7. C/raxmaan Khaalid Macow
8. C/laahi Cabdi Nuur

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRAHA GUUD
DIIWAAN NO: HHN/104/2023
TAARIIKH: 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J. F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 142 **TAARIIKH: 8 OKTOOBAR 2023**

DHISMAHA LAANTA LA-SOCODKA HUBKA IYO RASAASTA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad iyo Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah,kuna saabsan xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo awoodihiisa dastuuriga ah;

MARKA UU ARKAY: Baahida loo qabo in la horumariyo hannaanka maareynta hubka iyo rasaasta iyada oo la xaqiijinayo Amniga Qaranka, daahfurnaanta, iyo u-hoggaansanaanta halbeegyada caalamiga ee la xiriira maareynta hubka iyo rasaasta;

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

CUTUBKA 1AAD
DHISMAHA IYO UJEEDDADA
QODOBKA 1AAD
DHISMAHA

1. Waxaa la dhisay marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan Laanta La-socodka Hubka iyo Rasaasta taas oo noqonaysa mid u madaxbannaan xilgudasheeda kana tirsan Xafiiska Amniga Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

QODOBKA 2AAD
UJEEDDADA

1. Ujeeddada kowaad ee laga leeyahay Laanta La-socodka Hubka iyo Rasaasta waain ay la socoto oo korjoogteyso maareynta, dhaqdhaqaaqa iyo adeegsiga hubka iyo rasaasta gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Laantu waxa ay ka shaqeynaysaa sidii loo horumarin lahaa kartida iyo aqoonta laxiriirta maareynta hubka iyo rasaasta ee hay'adaha amniga Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo gobollada kale ee dalka.

3. Laantu waxa ay u ololeynaysaa daahfurnaanta, isla xisaabtanka, iyo isticmaalka saxda ah ee waxyaabaha qarxa iyo rasaasta ee Ciidamada Amniga Soomaaliyeed.

CUTUBKA 2AAD
QAAB-DHISMEEDKA
QODOBKA 3AAD
QEYBAHA LAANTA

1. Laantu waxa ay hoostagaysaa Xafiiska Amniga Qaranka waxayna ka kooban tahay qeybaha soo socda:

   a) Qeybta la-socodka;
   b) Kooxda Kaalmada Farsamo;
   c) Guddiga La-talinta

QODOBKA 4AAD QEYBTA LA-SOCODKA

1. Qeybta la-socodka waxay u xilsaaran tahay hawl maalmeedka, turxaanbixintaxogaha, warbixinnada, iyo isku dubbaridka hawlaha laanta.

QODOBKA 5AAD
KOOXDA KAALMADA FARSAMO

1. Kooxda Kaalmada Farsamo waxay ka kooban tahay khubaro aqoon u leh maareynta hubka iyo rasaasta, maareynta haraadiga walxaha qarxa, maareynta elektarooniga ah ee xogaha (IT), iyo arrimaha sharciga.

QODOBKA 6AAD
GUDDIGA LA-TALINTA

1. Guddiga La-talinta wuxuu ka kooban yahay xubno ka socda hay'adaha Dawladda Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka,

gobollada kale ee dalka, iyo saaxiibada caalamiga ah ee Soomaaliya ka taageera arrimaha maareynta hubka iyo rasaasta.

CUTUBKA 3AAD
HAWLAHA IYO WAAJIBAADKA
QODOBKA 7AAD
LA-SOCODKA IYO KORJOOGTEYNTA

1. Laantu waxa ay la soconaysaa keydinta, maareynta, iyo qaadista ama daabulista hubka iyo rasaasta ee gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Laantu waxa ay sameynaysaa baaris joogto ah iyada oo booqashooyin baariseed ku tagaysa goobaha hubka iyo rasaasta lagu keydiyo ama ay yaallaan si waafaqsan halbeegyada u degsan maareynta hubka iyo rasaasta.
3. Laantu waxa ay baaraysaa arrimaha hubka iyo rasaasta iyada oo ka wabixinaysa wixii khaldan xagga maareynta ama tirada hubka iyo rasaasta iyo dhacdooyinka la xiriira maareynta hubka iyo rasaasta.

QODOBKA 8AAD
TABOBARRADA IYO KAALMADA

1. Laantu waxa ay bixinaysaa kaalmo farsamo, tabobar, iyo wax allaale wixii kor loogu qaadi karo aqoonta iyo kartida Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ee la xiriirta maareynta hubka iyo rasaasta.
2. Laantu waxa ay qabanqaabinaysaa kulamo aqoon-kordhin iyo barnaamijyo tabobar oo la siinayo xubnaha Ciidamada Amniga.
3. Laantu waxa ay fududeynaysaa aqoon-is-weydaarsiga iyo wax-kala-barashada u dhaxeysa hay'adaha Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

QODOBKA 9AAD
DABAGALKA ELEKTAROONIGA AH IYO WARBIXINNADA

1. Laantu waxa ay gacanta ku heynaysaa xog-dhigaal elektaroonig ah oo ay ku keydsan yihiin dhammaan xogaha hubka iyo rasaasta diiwaangashan.
2. Laantu waxa ay soo saaraysaa warbixinno joogto ah oo ku saabsan dhaqdhaqaaqa iyo xaaladda hubka iyo rasaasta.

3. Laantu waxa ay xaqiijinaysaa in xogaha xasaasiga ah loo keydiyo loona maareeyosi aan wax u dhimeynin Amniga Qaranka.

QODOBKA 10AAD
HANNAANKA XIRIIRKA

1. Laantu waxa ay dhisaysaa ayna gacanta ku heynaysaa hannaan xiriir oo ay kula shaqeyso Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Ciidamada Amniga.

2. Laantu waxa ay si degdeg ah uga soo jawaabaysaa weydiimaha, cabashooyinka, iyo talooyinka ka soo gaara hay'adaha heer dawlad goboleed.

3. Laantu waxa ay ku shaqeynaysaa hannaan taabbagelinaya xiriir furan iyo wadashaqeyn.

CUTUBKA 4AAD

WARBIXINNADA IYO ISLA XISAABTANKA
QODOBKA 11AAD
WARBIXINNADA IYO ISLA XISAABTANKA

1. Laantu waxa ay warbixinno joogto ah siinaysaa Dawladda Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, saaxiibada caalamiga ee ay khuseyso, iyo cid kasta oo ka mid ah saamileyda hannaanka maareynta hubkaiyo rasaasta.

2. Laantu, marka ay gudanayso waajibaadkeeda, waxa ay ku shaqeynaysaa daahfurnaan iyo isla xisaabtan.

CUTUBKA 5AAD

MUDDADA IYO WAX-KA-BEDDELKA
QODOBKA 12AAD
MUDDADA

1. Xeerkaan Madaxweyne waxay dhaqangaleysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha waxayna ahaaneysaa dhaqangal haddii Dawladda Federaalka Soomaaliya aysan beddelin ama burrin.

QODOBKA 13AAD
DIB-U-EEGISTA IYO WAX-KA-BEDDELKA

1. Xeerkaan Madaxweyne waxaa lagu sameyn doonaa dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel hadba sida baahidu ay tahay iyada oo la xeerinayo duruufaha cusub, faritaannada sharci, iyo baahiyaha shaqo.

2. Wax-ka-beddel kasta oo lagu sameynayo Xeerkaan Madaxweyne waxaa lagala tashanayaa Xafiiska Amniga Qaranka.

CUTUBKA 6AAD

QODOBBO GEBOGEBO AH
QODOBKA 14AAD
DHAQANGELINTA

1. Dhammaan hay'adaha dawladeed waxay kala shaqeynayaan kuna gacansiinayaanLaanta dhaqangelinta xeerkaan.

QODOBKA 15AAD
DHAQANGALKA

1. Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/103/2023
TAARIIKH : 24/10/2023
SAXIIX :
AAV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 144 **TAARIIKH:15 OKTOOBAR 2023**

XIL KA QAADIS GUDDOOMIYIHII (REKTARKII) HORE EE JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED & MAGACAABISTA SII-HAYAHA GUDDOOMIYAHA (REKTARKA) CUSUB EE JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad. Xarfaha 'a ', ' b ' iyo ' c ' Iyo faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarfaha ' b ' iyo ' c ' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay muhiim tahay in la magacaabo Sii-haye cusub oo ay yeelato Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Waxaa **Proff. Xasan Cumar Mahadalle** laga qaaday xilkii **Guddoomiyenimo (Rektarka) ee Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed**.

Qodobka 2aad

Waxaa **Dr. Xasan Cismaan Gacal** loo magacaabay in uu noqdo **Sii-Hayaha Guddoomiyaha (Rektarka) Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed**.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAW/10/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guhaie
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 145 **TAARIIKH: 16 OKTOOBAR 2023**

WAREEJIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Booliska Soomaaliyeed warqadda summadeedu tahay **REF/XTCB/21/69/2023,** kuna taariikheysan **11/10/2023,** ujeedaduna tahay Soo Wareejin Sarkaal.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka X.D Soomaaliyeed warqadda summadeedu tahay **XTC/XDS/0244/23,** ujeedaduna tahay Ogolaansho Wareejin Sarkaal.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa Sarkaalkan oo ka tirsanaa Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed loo wareejiyey Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed isaga oo wata derajada ku hor qoran magaciisa.

NO	Darajo	Magaca
1.	G/le	Maxamed Xaashi Canshuur

Qodobka 2aad

Sarkaalkaan ku tilmaaman xeerkan waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ee sharcigu oggol yahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/100/2023
TAARIIKH : 24/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 146 **TAARIIKH:16 OKTOOBAR 2023**
OGOLAANSHO FULIN XUKUNNO QISAAS AH

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A' 'B' iyo " C "ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS.
MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay **LR/MCQS/633/2023,** ee Codsiga Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida, ee soo baxday **15/10/2023.**
MARKUU TIXGELIYAY: Inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta soomaaliyeed.

Waxuu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo xeerkan, waxuu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo qisaas ah gacan ku dhiiglayaasha kala ah:

1. Dambiile gacan ku dhiigle **D/Le Bol C/laahi Ibraahin Yarow (Boorow)** 38 jir ah, ina Faadumo Maxamed Nuur, kuna dhashay **Buur Hakaba**. Wuxuu gacan ku dhiiglaha si bareer ah u dilay **Marxuum Isgoowe Maxamed Aadan**, taariikhdu marka ay ahayd **03/06/2023**, falkaas oo ka dhacay **Magaalada Baydhabo**.

2. Dambiile gacan ku dhiigle **D/Le X 25141 Ismaaciil C/laahi C/raxmaan (Dhegay)** 25 jir ah, ina Xamaro Iidow Axmed, kuna dhashay **Xudur.** Wuxuu gacan ku dhiiglaha si bareer ah u dilay Marxuum **Ex. S/A Bol 21075 Xuseen Ugaas C/raxmaan**, taariikhdu marka ay ahayd **20/09/2020**, falkaas oo ka dhacay **Magaalada Xudur**.
3. Dambiile gacan ku dhiigle **D/Le Dar Geedow Maxamed Fiidle (Abuurow)** 23 jir ah, ina Xaawo Ibraahin Maxamed, kuna dhashay

Ufurow. Wuxuu gacan ku dhiiglaha si bareer ah u dilay **Marxuum Mursal Cali Cabdi**, taariikhdu marka ay ahayd **27/03/2020**, falkaas oo ka dhacay **Degmada Buur Hakaba.**

4. Dambiilayaal gacan ku dhiiglayaal **D/Le Xuseen Cali Macalin Iimaan (Gurey) 23** jir ah, ina Nishaamo Aadan Yuusuf, kuna dhashay **Bakool**. **D/Le X C/waaxid Cali Sh. Aadan 23** jir ah, ina Nuuriyo Macalin Mukhtaar, kuna dhashay **Baydhabo**. Kuwaasoo si wadajir, bareerna ah u dilay **Marxuum Muxiyadiin Maxamed C/raxmaan,** taariikhdu marka ay ahayd **18/06/2018**, falkaas oo ka dhacay Magaalada **Baydhabo.**
5. Dambiile gacan ku dhiigle **D/Le Bol Aadan Maxamed Xasan Ibraahim (Boqol)** 24 jir ah, ina Faadumo Carbow Xuseen, kuna dhashay **Baydhabo**. Wuxuu gacan ku dhiiglaha si bareer ah u dilay **Marxuum Sheekh Cali Axmed Xasan,** taariikhdu marka ay ahayd **13/08/2018**, falkaas oo ka dhacay Degmada **Baydhabo**.
6. Dambiile gacan ku dhiigle **D/Le X. Yuusuf Isaaq Nuur Aadan (Marqaan)** 30 jir ah, ina Faadumo Wardheere, kuna dhashay **Baydhabo.** Wuxuu gacan ku dhiiglaha si bareer ah u dilay **Marxuum Mustaf Xaaji Xasan,** taariikhdu marka ay ahayd **23/09/2013,** falkaas oo ka dhacay **Magaalada Baydhabo.**

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso qisaastan.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqan gelayaa xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALI
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HGH/099/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J. F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 147 **TAARIIKH: 18 OKTOOBAR 2023**

MAGACAABID XUBNO KAMID NOQONAYA XUBNAHA MAAMULKA BANGIGA DHEXE (NON-EXECUTIVE DIRECTORS)

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: **Sharci Lr. 130** ee soo baxay **22/04/2012,** kuna saabsan Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo Hey'adaha Maaliyadda Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Waraqadda sumadeedu tahay **XRW/191/08/2023,** ee soo baxday **24/08/2023,** kuna saabsan Soo Jeedin Magacaabid xubno kamid noqonaya Xubnaha Maamulka Bangiga Dhexe ee Soomaaliya (**Non-Executive Directors**).

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin xubnaha.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa uu magacaabay labo xubin oo kamid noqonaya Xubnaha Guddiga Maamulka Bangiga (**Non-Executive Directors**) kuwaas oo kala ah:

1) Prof Cabdullaahi Sheekh Cali Ibraahim
2) Faysal Cabdullaahi Warsame

Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqan gelaya marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN/0981/2023
TAARIIKH : 24/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 148 **TAARIIKH: 18 OKTOOBAR 2023**
DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka Ku-Meel Gaar ah J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **XTS/XDS/0277/2,** ku taariikheysan **18/10/2023,** ujeedaduna tahay **Soo Jeedin Dallacsiin Sarkaal.**

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo sarkaalkan.

Waxaa uu Madaxweyhuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran, isagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.

Tr.	Darajo	Magaca	U Dallacay
1.	G/Sare	Dayax Cabdi Cabdulle	S/Guuto

Qodobka 2aad

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggol yahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HGW/0972/2023
TAARIIKH : 24/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guta
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XEER MADAXWEYNE LR. 143 **TAARIIKH: 12 OKTOOBAR 2023**

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE SIYAASADDA AHNA ISKU-DUWAHA XAFIISKA ISKU-DUWIDDA BARNAAMIJKA SIYAASADEEDKA MADAXWEYNAHA J.F.S.

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay Marwada loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye Sare ee Madaxweynaha J.F.S.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa Marwada magaceedu hoos ku qoran yyahay loo magacaabay jagada ku hor qoran.

No.	Magaca	Jagada
1.	Hodan Maxamed Xasan	La-taliye sare ee siyaasadda ahna Isku-duwaha xafiiska Isku-duwidda Barnaamijka Siyaasadeedka Madaxweynaha J.F.S.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Hgg/102/2023
TAARIIKH : 29/10/2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 06/04/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.123

XRW - BIXIT
08 APR 2023
OPM - EXIT

XEERKA: XAKAMEYNTA HUBKA CAASIMADDA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soo jeedinta Wasiiru Dowlaha Waasaradda Amniga Gudaha

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.28.04.23 ee 06/04/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Xakameynta Hubka Caasimadda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leedahay meel-marinta Xeerka Xakameynta Hubka Caasimadda.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.28.04.23** ee **06/04/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Xakameynta Hubka Caasimadda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Amniga Gudaha loo igmaday fulinta iyo meel-marinta Xeerka Xakameynta Hubka Caasimadda.

Qodobka 3aad

Xeerka Xakameynta Hubka Caasimadda, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HHN-065-23
TAARIIKH : 12-04-2023
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 06/04/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.124

XEERKA: SIYAASADDA QARAN EE QURBA-JOOGTA SOOMAALIYEED

PRW - BIXIT
08 APR 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.28.04.23 ee 06/04/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Qurba-joogta Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leeyadahay in la meel-mariyo Siyaasadda Qaran ee Qurba Joogta Soomaaliyeed

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.28.04.23 ee 06/04/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaadadda Qaran ee Qurba Joogta Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah loo igmaday fulinta iyo meel-marinta Siyaadadda Qaran ee Qurba Joogta Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad


Xeerka Siyaadadda Qaran ee Qurba Joogta Soomaaliyeed, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane, Hamza Abdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-064-23
TAARIIKH: 12-04-2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga



SIYAASADDA QARAN EE QURBAJOOGTA SOOMAALIYEED 2023

Tusmo

Liiska xarfaha la soo gaabiyay 4
Hordhac.....4
1. SOO KOOBID GUUD.....*6* UJEEDOOYINKA SIYAASADDA.....7
MABAADIIDA HAGAYSA SIYAASADDA.....8
1.1 HORDHAC IYO GOGOLXAAR 9
1.2 MAANGALNIMO/MACQUULNIMO.....10
2. WAXA UGU WANAAGSAN EE LAGA BARAN KARO XIRIIRKA QURBAJOOGTA.....*11*
2.1 WADASHAQAYNTA QURBAJOOGTA.....11
2.2 CAQABADAHA UGU WAAWEYN.....11
3.LAFAGURKA XAALADDA QURBAJOOGTA EE TAAGAN.....11
3.1 ISBADDALLADA IYO XAALADDA TAAGAN.....12
3.2 MUUQAALKA GUUD EE SOOMAALIDA QURBAJOOGTA AH.....13
3.3 URURRADA QURBAJOOGTA AH.....15
4. DHINACYADA SIYAASADDU AWOODDA SAARAYSO *15*
4.1 MAAMULKA.....15
4.2 4.2 KA QAYB QAADASHADA ,SIYAASADDA, MAAMULKA IYO GANACSIGA.....16
4.3 XOGTA IYO WARBIXINTA.....17
4.4BADQABKA IYO AMMAANKA.....19
4.5 MUDNAAN SIINTA HAWEENKA 20
4.6 DHALLINYARADA 21
4.7DALXIISKA IYO DHAQANKA 22
4.8 ISDHEXGALKA IYO DIB-USOO LAABASHADA QURBAJOOGTA 24
4.9 CAAFIMAADKA.....25 4.10 WAXBARASHADA 27
5. GABAGABO 28
5.1 *Mudnaanta Siyaasadda ee muddada gaaban* *28*
5.1.1 Samaynta iyo Xoojinta xiriirka qurbajoogta *28*
5.1.2 Qeexidda shabakadaha gudaha, kooxaha iyo ururrada *28*
5.1.3 Qorshaynta istiraatijiyad wada xiriir hagaagsan.....*28*
5.1.4 5.1.4 Qorshaynta qaybaha iskaashiga qurbajoogta.....*29*
5.1.5 Baahinta Siyaasadda.....*29*
5.2 *Mudnaanta Siyaasadda Muddada dheer*.....*29*
5.2.1 Maalgashiga tooska ah ee qurbajoogta.....*29*
5.2.2 Hababka isgaarsiinta.....*30*
5.2.3 Gudbinta Waxbarashada.....*30*
5.2.4 Gudbinta Xirfadaha.....*30*
5.2.5 Ganacsiga iyo Dalxiiska.....*31*

List of Acronyms

Name	Acronym
Diaspora and Emergency Action & Coordination DEMAC (DEMAC)	
The Department of Diaspora Affairs	DODA
Eastern and the Horn of Africa	EHOA
Gender-Based Analysis GBA Gross Domestic Product GDP	
Gulf Cooperation Council	GCC
Information and Communication Technology	ICT
International Organization for Migration	IOM
Microfinance Institution	MFI
Migration for Development in Africa	MIDA
Ministry of Foreign Affairs and international Cooperation	MOFAIC
National Development Plan	NDP
Small and Medium [scale] Enterprises	SMEs
United Nations Population Fund	UNPF

Fariinta Wasiirka



Siyaasaddani waa tii ugu horaysay ee Qurbajoogta Soomaaliyeed, waxaana looga golleeyahay in ay abuurto xiriir wanaagsan oo faa'iido u leh Soomaaliya iyo Qurbajoogteeda, iyadoo laga duulayo ujeeddada awoodsiinta qurbajoogta si ay uga qayb qaataan hormarka dalka.

Haddaba siyaasadu, waxay diiradda saaraysaa sidii loo horumarin lahaa loona ballaarin lahaa awoodda Soomaalida faraha badan ee qurbajoogta ah iyo sidii ay kaalin mug leh uga qaadan lahaayeen isbeddelka dhaqandhaqaale ee dalka, una heli lahaayeen taageerada iyo is garabtaaga ay uga bahaan yihiin gudaha dalkooda.

Soomaalida qurbajoogta ahi mar walba waxay qayb ka yihiin hormarka dalkooda. Sanado badan ka dib, qaarkood waxay awood u yeesheen in ay iskood isu abaabulaan una samaystaan ururro bulsho, laakiin maqnaanta barnaamijyo rasmi ah ayaa keentay in hal-abuurkoodu noqdo mid yar oo aan joogto ahayn, si rasmi ahna ula falgalin qorshayaasha iyo istiraatijiyada horumarineed ee dalka.

Sidaas darteed waddanku wuxuu ku seegay fursadado badan si uu uga faa'iidaysto waxtarka qurbajoogta. Hadaba, waxaa la samayn doonaa ururro leh ujeedooyin cad cad kuwaas oo awood u siinaya qurbajoogta in ay ka qayb qaataan hormarinta dalka.

Siyaasaddani waa fariin ku wajahan qurbajoogta Soomaaliyeed iyadoo aan loo eegayn da'da, jinsiga, dabaqadda dhaqaale iyo heerka aqooneed si ay qayb uga noqdaan isbeddelka bulsho iyo midka dhaqaale ee Soomaaliya. Siyaasaddani diiradda saari mayso kaalinta qurbajoogta ee dalkooda oo qura ee waxay ballaarinaysaa adeegga dowladda ee mawaadiniinteeda qurbajoogta ah. Dowladda waxaa ka go'an in ay samayso siyaasad lagula macaamilayo qurbajoogta oo guulaysata iyo taageeridda hirgalinteeda.

Mudane Abshir Cumar Jaamac

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

1. Soo Koobid Guud

Waxaa aysan su'aali ka taagnayn in aragtida socdaalka iyo qurbajoogta ay xiriir dhow la leedahay horumarka waddamada martigaliyaayaasha ah iyo waddamada asalka ah ee qurbajoogta. Soomaalida qurbajoogta ah waxay bixiyeen taageero ay u fidiyeen qoysaskooda xilliyadii colaadaha sokeeye socdeen iyo wixii ka dambeeyay. Sidoo kale,

waxa ay door ka qaataan horumarrada gargaarka bini'aadamnimo si guud iyo si shaqsi ahba, maaddaama ay qurbajoogtu door fiican ku leedahay maamulka iyo siyaasadda ee waddamada martigaliyey.

Dowladda Federalka ah ee Soomaaliya waxaa ka go'an mudnaansiinta iyo la macaamilka muwaadiniinteeda qurbajoogta ah si ay uga qayb qaataan horumarinta dalka si walba oo macquul noqon karta. Dowladdu waxay aqoonsan tahay doorka qurbajoogtu ay ku leedahay dhisidda nabadda, deeqaha dhaqaale ee qurbajoogtu ay ku caawiyaan bulshadooda, adkaysiga dhaqaale ee qoysaska, gudbinta aqoonta, maalgashiga, hal-abuurka ganacsiga iyo shaqa-abuurka.

Ayagoo kaashanaya adeegyada teknolojiyadda iyo xiriirka, degaannada ay ku nool yihiin qurbajoogtu waxa ay heer fiican ka gaareen Dalka martigaliyay iyo sidoo kale dalkooda asalka ah. Waxaa xusid mudan in dowlado badan ay daahfureen siyaasado iyo istiraatijiyado lagu qeexay doorka qurbajoogtu ka qaadan karaan horumarinta dhaqaale ee dalkooda asalka ah, ayagoo aan si toos ah dalkooda dib ugu soo laaban, balse shaqooyinkaas oo dhan ay qabteen ayagoo ku maqan dalka dibaddiisa. Intaas waxaa dheer in wax ka badal lagu sameeyo nidaamka socdaalka uu fududayn karo kor-u-qaadidda isdhexgalka iyo la macaamilka qurbajoogta.

Shaqooyinka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ayay ka mid tahay la macaamilka qurbajoogta Soomaalida ah kuwa ku nool dibadda iyo gudaha dalka, sida uu mudnaanta siinayo nuqulka "Siyaasadda Arrimaha Dibadda 2015" sidaas daraadeed, 2013 ayaa la aasaasay Waaxda Arrimaha Qurbajoogta ee Wasaaradda Arrimaha Dibaddu si ay wadashaqayn iyo macaamil ula yeelato qurbajoogta, uguna xirto ururrada bulshooyinka qurbajoogta ah, safaaradaha Soomaaliya ee dalka dibaddiisa.

Intaas waxaa dheer, siyaasaddani waxa ay waddada u xaaraysaa in si sharciyeysan ah loola macaamilo qurbajoogta Soomaalida ayadoo ay arrimahaas hoggaaminayso Waaxda Qurbajoogta ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo guud ahaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayadoo kaashanaysa wasaaradaha kale, bulshada rayidka ah si ay qayb uga qaataan

ballaarinta awooddooda ka qaybqaadasho, isdhaafsiga dhaqaalaha sida ay ka rajaynayso dowladdu islamarkaasna ay heli doonaan gunnooyin lagu dhiirrigalinayo.

Nuqulsiyaasadeedkan waxaa ku cad ujeeddada siyaasadda, habraaca iyo mabaa'diida siyaasadda iyo sidoo kale ujeeddooyinka dhow iyo kuwa fog ee ay higsanayso siyaasaddu.

Ujeeddooyinka Siyaasadda

In la horumariyo siyaasad lagula macaamilayo qurbajoogta waxay muhiim u tahay horumarka Dalka, Dhaqaalaha, Siyaasadda, Taariikhda soojireenka ee qurbajoogta dalka,

abaabulka qurbajoogta, tirada qurbajoogta, degaannada ay kala joogaan iyo khayraadka qurbajoogta. Barnaamijyo badan oo ay qabteen qurba joogta ayaa guul dhow iyo mid fogba laga gaaray, inkastoo saamaynta dhaqaaale ee barnaamijyadaas ay yaraayeen.

Ugu dambayntii, waddamada ku guulaystay istiraatijiyadda iyo siyasadda qurbajoogtooda waa kuwa fuliyay siyaasadda qurbajoogtooda. Waxaa jira waddamo badan oo bogaadiyay muhiimadda la macaamilka iyo xiriirka qurbajoogtooda, halka kuwo kale ay ku guul daraysteen hirgalinta siyaasad macna weyn oo ay kula macaamilaan qurbajoogtooda.

Ujeeddooyinka guud ee Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta waa:

In la hubiyo in Dowladda Federalka samayso iskuxir dhexe oo lagu kormeerayo dadaallada qurbajoogtu ay doonayaan in ay uga qaybqaataan horumarinta dalka ayagoo u sii maraya hal-abuur u fududayn kara ka qaybqaadashadooda horumarka dalka.

In la hirgaliyo lana horumariyo siyaasad lagu dhiirrigalinayo qurbajoogta si ay uga qayb qaataan horumarka dalka.

In la horumariyo lana hirgaliyo siyaasad xoojinaysa wacyiga qurbajoogta iyo ka qaybgalkooda horumarrada qaranka.

In la abuuro madal dhexe iyo xogkaydiye lagu aruuriyo xogaha qurbajoogta, barnaamijyadooda iyo fursadaha maalgashi si loo ogaado doorka qurbajoogta ee horumarrada qaranka.

In la horumariyo iskaashiga u dhexeeya wasaaradaha Dowladda Federalka si kor loogu qaado doorka qurbajoogta.

In la horumariyo siyaasado iyo barnaamijyo lagu taageerayo dib-usoonoqoshada iyo isdhexgalka qurbajoogta gudaha dalka.

Safaraadaha iyo qunsiliyadaha Soomaaliya ee dibadda in loo sameeyo siyaasado wacyigalin iyo isdhexgal bulsheed.

Mabaa'diida hagaysa siyaasadda

Siyaasaddani waxay ku salaysan tahay mabaadii'da hoos ku xusan:

B). In la aqoonsado doorka muhiimka ah ee qurbajoogta Soomaaliyeed ku leeyihiin horumarka dhaqandhaqaale ee dalka iyo baahida loo qabo in la mideeyo dadaallada lagula xiriirayo qurbajoogta.

T). Xiriirka iyo wadashaqaynta la la yeelanayo qurbajoogta in lagu soo daro Hirgalinta, Kormeerka iyo Qiimaynta barnaamijyada qurbajoogta si loo fududeeyo in waqtigeeda lagu hirgaliyo Siyaasadda Qaran ee Qurba joogta.

J). Kormeerka siyaasadda waxa ka mid ah habab lagu kormeerayo dhammaan shaqooyinka la xiirira qurbajoogta Soomaalida ayadoo loo sii marayo maamulka dhexe ee Dowladda iyo Waaxda Arrimaha Qurbajoogta si meesha looga saaro shaqooyin soo laalaabta ama laba jeer la qabto.

X). Arrimaha haweenka, qaabdhismeedka Siyaasadda in lagu soo daro fursado taageeraya haweenka.

Kh). Dhallinyarada, ayadoo la eegayo tirada dhallinyarada Soomaaliyeed, hay'adda Qaramada Midoobay ee UNPF waxa ay ku qiyaastay dhallinyaradu in ay katahay boqolkiiba toddobaatan iyo shan 75% marka loo eego guud ahaan bulshada inteeda kale, sidaas daraadeed siyaasaddani waxa ay taageeraysaa bulshada dhallinyarada ah.

D). Islaxisaabtanku wuxuu hagi doonaa dhammaan mabaa'diida saamilayda qurbajoogta ah si loo hirgaliyo siyaasaddani iyo barnaamijyada qurbajoogta. Dhammaan saamilayda waxaa laga rajaynayaa in ay raacaan hannaanka ugu fiican ee Dowlad wanaagga.


R). Siyaasadda loo dhan yahay, waa qayb muhiim ah oo ka mid ah siyaasaddan, ayadoo la la xiriirayo dhammaan saamilayda iyo qurbajoogta si ay qayb uga qaataan horumarinta wadahadal dhex mara ayadoo aan loo eegayn; jinsi, da', awood, caafimmaad, afkaar siyaasadeed ama dabaqad dhaqaale.

1. 1 Hordhac iyo Gogol-xaar

Hormarinta Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta waxay ahayd barnaamij Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga uga gollahayd isku xirka Qurbajoogta iyo dowladda si ay qayb uga qaataan horumarrada waqtiga dhow iyo waqtiga fog ee Soomaaliya. Hay'adda Socdaalka Qaramada Midoobay (IOM) ayaa bixisay taageero farsamo oo muhiim u ahayd looguna baahnaa dhamaystirka siyaasaddan. Wasaaradda Arrimaha Dibaddu waxay dadaal dheer u gashay in ay hoggaamiso dhisidda xiriirka u dhexeeya Qurbajoogta iyo Dalkooda Soomaaliya.

Wadatashiyo ayaa la sameeyay lana hirgaliyay si loo soo saaro qabyo qoraalka koowaad ee siyaaadda. Kulan loo dhan yahay ayaa sidoo kale la qabtay si loo helo qaybta iyo fikirka ay siyaasaddan ku darsanayaan Maamulka Gobolka Banaadir, Maamulgoboleedyada, ururrada qurba joogta iyo madaxda jaaliyadaha Yurub, Afrika iyo Aasiya Intaas waxaa dheer, in la qabtay laba wadatashi oo loo qabtay haweenka ku nool

gudaha iyo dibadda si loo hubiyo qaybta haweenka ee hagaysa siyaasadda. Habka wadatashigu wuxuu ahaa mid fududaynaya sahaminayana wada shaqaynta Maamulgoboleedyada ayadoo la aqoonsan yahay muhiimadda doorka haweenka Soomaaliyeed ee horumar waara.



Jaantuska 1$_{aad}$ ee Soomaalida Qurbajoogta ah ee dibadda (SomaliNet)

Siyaasaddan, Wasaaradda Arrimaha Dibadda Waaxdeeda Arrimaha Qurbajoogta waxay hagaajin doontaa, xoojinna doontaa dadaallada si ay u midayso dhaqdhaaqyada iyo iskuxirka dalladaha qurbajoogta si ay uga qayb qaataan dib-u-dhiska dalka. Dadaallada ay waaxdu waddo waxay ku salaysan yihiin aragti ah "u baddalidda socdaalka hormar waara" maaddaama socdaalka iyo qurbajoogtu ay yihiin awood dhalin karta hormar waara oo ay gaaraan dadka iyo bulshooyinkooda ka soo hayaamay dalkooda asalka ah iyo dalalka martigaliya labadaba. Siyaasaddu waxay waddada u xaaraysaa saamaynta istitraatijiyad wadaxiriir oo awood u siinaysa in macaamil fiican la la yeesho qurbajoogta.

Qaybaha wadaxiriirku ka kooban yahay

Ayadoo loo sii marayo iskuxirka hababka wadaxiriirka, siyaasadan waxay qurbajoogta ku dhiirrigalinaysaa una soo jiidaysaa in qurbajoogta Soomaaliyeed ka qaybqaato horumarka iyo dib-u- soo kabashada dalka. Istiraatijiyad wadaxiriir waxa ay ka caawin kartaa wada hadallada la la yeelanayo qurbajoogta Soomaaliyeed, iyo ururrada maalgashi. Tani waxa ay siinaysa hage caawinaya Wasaaradda Arrrimaha Dibadda, danjirayaasha Soomaaliyeed iyo wakiillada dibadda marka ay jeedinayaan barnaamijyada la xiriira

arrimaha qurbajoogta ayagoo u sii maraya xogaha lagu soo bandhigo wadaxiriirka dowladda iyo qurbajoogta.

1.2 Maangalnimo (Rational)

Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020-2024 wuxuu aqoonsan yahay awoodda qurbajoogta Soomaalida ee horumarinta dalka. Siyaasaddan waxay midaynaysaa shaqooyinka ay ka mid yihiin qaabdhismeed muhiim ah kaas oo la hirgalin doono laguna sixi doono khaladkii taarikhiga ahaa ee Qurbajoogta Soomaalida ka hor istaagay in ay wax ku soo kordhiyaan horumarka dalkooda. Intaas waxaa dheer, Soomaalida Qurbajoogta ah waa kuwo danaynaya dalkooda ayna ka go'an tahay in ay dunida kale uga gudbiyaan sawir iyo warbixin fiican si ay ugu dhiirrigaliyaan in ajaanibtu dalxiis u yimaadaan dalka, ka qayb qaataan hormarinta dhaqandhaqaale, ku lugyeeshaan maalgashiga gudaha, dhaqanka, sidoo kale ay noqdaan safiirro wanaagsan oo matala dalka.
Taageerada Qurbojoogta Soomaalida ee dalka waa mid soo jireen ah oo ay ku caawinayeen bulsho badan iyo qoysas aad baahi ugu qabay. Waxaa jiray abaabullo lagu samaynayo qurbajoogta sanadihii dambe. Soomaali badan oo qurbajoog ah ayaa sameeyay mashaariic lagu sameeyay dhaqaale aruurin sida dhismayaal dugsi, dhismayaal xarumo daryeelka hooyada iyo dhallaanka, halka ururro iskood isku abaabulay ay sidoo kale fuliyeen mashaariic gargaar degdeg ah lagu gaarsiinayo dad tabaalaysan. Sidoo kale, ururrada haweenka ee Yurub iyo Waqooyiga America ayaa gacan ka gaystay caawinta dadka ay saameeyeen abaaruhu. Xirfadlayaasha caafimaadka ee qurbajoogta Soomaalida ah ayaa si la mid ah iskood isku abaabulay si ay ugu tabarrucaan adeeg iyo qalab caafimaad oo lagula tacaalayo saf-marka Covid 19. Soomaali badan ayaa bogaadisay dadeelladan naf badbaadinta ah.

Waaxda Arrimaha Qurbajoogta ee Wasaaradda Arimaha Dibadda waxay qaadatay door firfircoon si ay u hoggaamiso horumarinta Siyaasadda Qaran ee Qurba joogta. Waaxda waxaa loo aasaasay kormeerka, abaabulka iyo midaynta ururrada qurbajoogta iyo horumarinta qaabdhismeedka guud oo iskuxiraya qurbajoogta.

2. Waxa ugu wanaagsan ee laga baran karo xiriirka qurbajoogta

2.1 Wadashaqaynta Qurbajoogta

Waxaa jira cashar muhiim ah iyo habraac laga baran karo hal-abuurro ay sameeyeen waddamo xiriir iyo macaamil la leh qurbajoogtooda. Qodobka ugu muhiimsan casharkaas waxaa uu yahay wadashaqayn la la yeeshay qurbajoogta ayadoo loo sii marayo golayaal

ay ku midaysan yihiin kuwaas oo qurbajoogtu ay ku lug leedahay ayagoo ka aasaasay siyaasado iyo istiratijiyado. Habkani wuxuu u saamaxayaa in ay siyaasaddu guulaysato, maaddaama qurbajoogtu u taagan tahay mid ka mid ah ururrada saamilayda ee ugu saamaynta badan uguna muhiimsan.

2.2 Caqabadaha ugu waaweyn


Dhisidda iskaashi u dhexeeya Dowladda iyo qurbajoogta waxay u badan tahay in uu guulaysto haddii ay jiraan istixgalin weyn oo dhidibbadu u aasan yihiin, wax wada qabsi, xiriir fiican iyo is-aaminaad. Waddamo badan qurbajoogtu waxay u arkaan dalkooda asalka ah in uu u arko il dhaqaale bixisa oo aan dhammaan, halka waddamo kale oo ah waddama asalka ah ee qurba joogta ay u arkaan qurba joogtooda kuwo muhiim ah oo loo baahan yahay. Haddaba, labada dhinacba waa in ay dareemaan in dhisidda kalsooni ay tahay arrin muhiim u ah la macaamilka qurba joogta iyo siyaasaddan.

Intaas waxaa dheer, in dadka ku nool gudaha dalka ay badanaa fikir khaldan ka haystaan qurbajoogta marka ay dib ugu soo laabanayaan dalka, sidaas darteedna siyaasaddu ay qayb ka qaadato ilaalinta qurbajoogta. Qabiillada kala duwan ee Soomaalida, dadka la hayb soco iyo dhinacyada siyaasadda waa in ay qayb ka yihiin Siyaasadda Qurbajoogta.

3. Falanqaynta Xaaladda Qurbajoogta ee taagan

3.1 Isbaddallada iyo Kororka Qurbajoogta

Qurbajoogta Soomaalidu waxay taariikh u leedahay hayaanka (migration) ka qarniyo Galbeedka, Geeska Afrika iyo shishe, ayagoo kala duwan hayaamayay. Hayaankii sanadihii 1987-1991 waxaa sababay dagaalladii sokeeye ee dalka ka qarxay, xasillooni la'aanta siyaasadeed iyo dhibaatada degaanka ee noqotay isbaddalka cimillada.



Jaantus2: Qiyaasta Soomaalida deggan meel ka baxsan bariga iyo Geeska Afrika. Bulshooyinka Soomaalida ee deggan Denmark, Filand, Norway iyo Sweden. Sidoo kale, Netherlands, Italy, iyo Germany.

Dagaalka sokeeye kaliya wuxuu barakiciyey lixdii qofba qof ka mida bulshada Soomaaliyeed. Sanadihii u dhexeeyay 1990-2015, tirada dadka Soomaaliyeed ee ku koray qurbaha 850,000 ilaa iyo 2 million ayay gaartay. Inkastoo barakaca ugu weyn uu keenay dagaalkii sokeeyo haddana, waxaa jira arrimo kale oo saamayn ku leh in hijro dhacdo waxaana ka mid ah shaqo la'aanta baahsan, yaraanta fursadaha dhaqaale ee dhallinyaradu heli karayaan.

Hay'adda Qaramada Midoobay ee Dhaqaalaha iyo Arrimaha bulshada ayaa sheegtay in 45,000 oo Soomaali ah ay sanadkii hayaamaan, intii uu socday caabuqii safmarka, sanadihii ugu dambeeyayna uu socday hayaankaas. Bar ka mid ah tirada kor ku xusanna ay noqtay qoxooti sanadihii u dambeeyey.

Qowmiyadda Soomaaliyeed waxaa laga helaa Jabuuti, Itoobiya iyo Kiinya, kuwaas oo xiriir wada dhalasho uu kala dhexeeyo Soomaalida ku nool

Jamhuuriyadda. Xogta ku saabsan tirada qurbajoogta dibadda ku maqan waa mid aan fadhin sanadihii ugu dambeeyey. Si kasta oo ay ahaato, Soomaalida qurbajoogta ah ee bariga iyo geeska Afrika deggan waxay ahaayeen 90% waxayna ku soo dheceen 65% . Tirada rasmiga ah ee bulshada Soomaaliyeed ee deggan waddamada Carabta, 500,000 oo ka mida waxay deggan yihiin Yaman kaliya, halka 200,000 oo kalana ay ku nool yihiin waddamada iskaashiga Golaha Gacanka Carbeed (GCC states). Fursadaha dhaqaale ee gobolkaas, iyo baahida dadka soo hayaamaya ayaa gacankaas ka dhigay meel dhaqaale ahaan loo soo hayaamo sanadihii dambe. Soomaalida qurbajoogta ah ee ku nool meel ka baxsan bariga iyo geeska Afrika waxay u badan yihiin Yurub iyo Ameerika. Yurub Soomaalidu waxay u badan yihiin boqortooyada Ingiriiska waxayna ku nool 110,000 (UK), Jarmalka waxaa ku nool (152,000), midowyga Yurub guud ahaan waxaa ku nool Soomaali lagu qiyaasay 100,000.

Ameerika qurbajoogta ku nool waxaa lagu qiyaasay 170,000 waana dalka labaad ee Soomaalida ugu badan ee qurbajoogta ah ay ku nooshahay. 1990 tiradu waxay kor uga kacday 3,000 ilaa iyo 150,000 sanadkii 2015. Sidoo kale Soomaali gaaraysa 50,000 ilaa 70,000 ayaa ku nool koofur Africa. Kanada waxaa ku nool (62,000), Ustaraaliya (20,000). Tiradan waa tii ugu dambaysay marka la isku daro, faracii koowaad, kii labaad iyo kii saddexaad ee Soomaalida qurbaha gashay. Waxaa loo baahan yahay dadaalo si loola macaamilo Soomaalidaan qurbajoogta ah ee ku kala nool waddamo kala duwan si loo hirgaliyo Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta.

3.2 Muuqaalka (Profile) Qurbajoogta Soomaaliyeed

Qurbajoogta Soomaliyeed waa kuwo sameeya dhaqdhaaq, waxa ay door fiican mar hore ku yeesheen horumarinta dhaqanka iyo dhaqandhaqaalaha dalkooda. Waxaa loo

baahnaan doonaa tirakoob lagu ogaanayo muuqaalka (Profile) guud ee qurbajoogta ayadoo loo eegayo qaybaha sida; waddamada ay ku nool yihiin ee martigaliyay, waxbarashada, shaqooyinka, da'da (rag iyo dumar). La macaamilka qurbajoogta Yurub iyo Waqooyiga Ameerika waa mid shaqadiisa lagu jiro waxaana loo baahan doonaa in la ogaado saamaynta cudurkii safmarka ahaa Coved-19 uu ku yeeshay dhaqaalahooda.

Sida lagu sheegay warbixin sahan maalgashi oo ku saabsan qurbajoogta Soomaalida ayna soo saartay hay'adda caalamiga ah ee Horumarinta Sanduuqa Beeraha (IFAD), waxaa jira baahi badan oo qurbajoogtu u qabto in ay maalgashadaan dalka, haddana saddex meelood meel ayaa la sheegay in ay tahay maalgashadayaal. Tusaale ahaan, dadka ka soo hayaamay dhulka

saxaraha Afrika ka hooseeya soona galay Ameerika ayaa wajahaya saboolnimo sare marka loo eego dadka kale ee soo hayaamay 6. Marka laga soo tago caqabadahaan, bulshooyinkaan waxay u dhow yihiin in ay dalka maalgashadaan haddii khataraha iyo caqabadaha dalka ka jira hoos u dhacaan.

Sahankan waxaa lagu sheegay in boqolkiiba 80% qurbajoogta Soomaaliyeed ay caawiyaan qoysaskooda iyo saaxiibbadood si bille ah, ayna ka bixiyaan kharashaadka cuntada, waxbarshada iyo adeegyada caafimaad2. Sida la hubo lacagahaas waxay cadayn u yihiin maalgashiyada socda ee dhaqaalaha iyo bulshada kuwaas oo mar horaba qurbajoogtu ku samaysay dalka Soomaaliya. Ka hor Covid19 cadadka lacagaha qurbajoogta Soomaaliyeed gudaha dalka u soo diraaan wuxuu ahaa qiyaastii $475.00 qofkiiba sanadkii. Intaas wixii ka dambeeyay lacagaha qurbajoogtu soo dirto waxay noqdeen qiyaastii $190.00 waxayna hoos u dheceen lixdan boqolkiiba 61%3. Waxaa xusid mudan, in lacagaha qurbajoogtu soo dirto aysan marna istaagin dakhliga qoysaska Soomaaliyeedna ay ka tahay boqolkiiba 50 ama 60%.

Sanduuqa lacagta adduunka (IMF) ayaa ku qiyaasay boqolkiiba 25% dakhliga guud ee dalka (GDP) in ay tahay lacagaha qurbajoogtu soo diraan. Lacagaha xawiladaha looga soo diray qurbaha sanadkii 2020, qiyaastii waxay gaareen 1.75 Bilyan Doolar, inkastoo laga yaabo in tiradu intaas ka badato marka loo eego ilo wareedyada kala duwan4.

Degganaan la'aanta siyaasadeed iyo xaddiga sare ee shaqo la'aanta dhallinyarada ee bariga iyo geeska Afrika ayaa keenay hayaanka ku salaysan nolol iyo dhaqaale raadin. Arrintaan waxay uga sii dartay markii dad badan u hayaameen waddamada Golaha Iskaashiga Gacanka Carbeed iyo koonfurta Afrika. Hay'adda Qaramada Midoobay ee IOM ayaa soo saartay in korarka hayaanku uu keenayo dhaqaale yari. Aaminsanaanta helid dhaqaale fiican, fursado faa'iido leh in laga helayo dalalka loo hayaamay. Xiriirka dhaqandhaqaale ee xooggan kana dhexeeya bulshooyinka qurbajoogta ah wuxuu kaalin ka gaystay in qurbajoogtu wax tar ka gaystaan dalkooda ayagoo u sii maraya lacagaha

lagu soo diro xawilaadaha, dhammaan arrimahaan in lagu soo daro qaab dhismeedka siyaasadda waxay muhiim u noqon doontaa in siyaasaddu si guul ah ku hirgasho.

3.3 Ururrada Qurbajoogta

Ururrada qurbajoogta waxay muhiim u yihiin in qurbajoogtu waxqabad ku soo kordhiyaan Soomaaliya. Ururradan waa kuwo u shaqeeya si rasmi ah (sida ururrada Dowladda u diiwaan gashan) iyo si aan rasmi ahayn labadaba. Qurbajoogta Soomaaliyeed waxay ku kala duwan yihiin awoodahooda shaqo, laakiin waxay ka midaysan yihiin in ay dhammaantood ka wada shaqeeyaan caafimaadka, waxbarashada, kaabayaasha dhaqaale, arrimaha bulshada, ganacsiga, siyaasadda iyo u qareemidda. Tusaale ahaan, Denmark kaliya oo ay ku nooshahay 16-21,000 Soomaali ah, 80 urur oo qurbajoog ah ayaa jira sida la xaqiijiyey ka hor safmarkii (COVID19) 5. Hay'adda qurbajoogta, gargaarada degdegga ah iyo iskuxirka ee (Diaspora and Emergency Action & Coordination (DEMAC) ayaa sanadkii 2021 waxay cilmibaaris ku sheegtay in urrurada qurbajoogta ay dhexgaleen ururrada gudaha dalalkooda asalka ah ayna xiriir fiican la yeesheen ururro kala duwan si ay uga qaybqaataan horumarada ka socda gudaha dalka 6. Hay'addu waxay sidoo kale, xustay in ururrada qurbajoogtu ay waayeen taageero dhaqaale iyo mid shaqaale. Mararka qaar ururrada qurbajoogtu waxay ku tiirsan yihiin xiriir ay la samaysteen hay'addo caalami ah (INGOs), ururro heshiis ay la galeen ama dowladaha dalalka martigaliyay.

4. Dhinacyada Siyaasaddu Awoodda Saarayso

4.1. Maamulka

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga waa ilaaliyaha Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta. Waaxda Arrimaha Qurbajoogta ee
Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayaa leh masuuliyadda ugu horaysa ee Fulinta, Kormeerka iyo Qiimaynta Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta. Daahfurnaanta iyo Islaxisaabtanku waa tiir muhiimad weyn u leh hirgalinta iyo taabbagalinta siyaasaddan, dhammaanna waa in laga wada qaybqaato in laga faa'iidaysto qurbajoogtu in ay gacan ka gaystaan horumarka dalka. Ayadoo la eegayo wadashaqaynta qurbajoogta Dowladda iyo saamilayda kale ee Dowladda iyo bulshada siyaasaddu dhinacyada ay awoodda saarayso ee ku xusan hoos waa kuwo dib loogu laaban karo lana hirgalin karo, sidoo kale siyaasadda waxaa ku cad sida ugu habboon ee la rajaynayo in guul looga gaaro hirgalinta siyaasadda.

Miisaaniyadda dhaqaale ee lagu maalgalinayo Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta waa in laga qoondeeyaa miisaaniyadda sanadlaha ah ee Dowladda Federalka Soomaaliya. Dowladda Soomaaliya waa in ay raadiso kaalmo dhaqaale oo lagu hirgaliyo Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta, ayadoo u sii maraysa bahwadaagteeda/deeqbixiyashaa caalamiga , ganacsatada iyo qurbajoogta qaar ka mid ah.

4.2. Ka qaybqaadashada Qurbajoogta ganacsiga iyo Maalgashiga

Dhaqaalaha Soomaaliya waa mid koraya xiriir adagna la leh ganacsiga adduunka iyo siyaasadaha maalgashiga xorta ah, taas oo soo jiidaysa maalgashata dibadda in ay maalgashadaan ganacsiga gudaha. Sidaas darteed, qaybta ugu mihiimsan ee dhaqaalaha waxa uu noqonaysaa beeraha iyo dhaqaalaynta xoolaha nool, dalagga ka soo go'a beeraha. Khayraadka beeraha ka soo xerooda waxaa lagu xisaabiyaa shan meelood saddex meel isdhaafsiga lacagaha qalaad ee dalka soo gala. Intaas waxaa dheer in kalluumaysiga, war isgaarsiinta, tamarta, warshadaha, tiknologiyadda, dhismayaasha, dalxiiska ay yihiin ilo dhaqaale oo muuqda. Dhammaan ilahan dhaqaale ee kala duwan waxay soo jiidan karaan maalgashatada. Dhaqaaluhu wuxuu ka soo kabtay hoos u dhac dhaqaale sanadkii 2020 halkaas oo koritaankiisa lagu qiyaasay 2.0% sanadkii 2021, arrintaana waxaa saamayn ku leh shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo dhoofinta xoolaha nool.

Sare u kaca heerka abaarta waxaa saamayn ku leh musiiboyin kala duwan oo ay ka mid yihiin; daadad, ayax, iyo caabuqa safmarka ah ee COVID 19. Ganacsiga gudaha waxaa sare u qaaday lacagaha xawiladaha lagu soo diro taas oo lagu qiyaasay 31.3% guud ahaan dakhliga dalka sanadkii 2021 halka ay ahayd 30.8% 2020. In la dhiso kalsoonida u dhaxaysa maalgashatada qurbajoogta iyo sidoo kale xasilloonida siyaasaddeed ee dalka waxay muhiim u tahay kororka maagashatada qurbajoogta ah ee dalka, iyadoo loo sii marayo istiraatijiyadaha hoos ku xusan.

1) In la abuuro guddi wadatashi oo qurbajoog ah in kor loo qaado xiriirka ka dhexeeya Dowladda Federalka iyo qurbajoogta Soomaaliyeed waxay muujinaysaa ka go'naan iyo wadashaqayn la la yeesho qurbajoogta. Muhiimadda koowaad ee guddiga waxay noqonaysa in qurbajoogtu wadashaqayn la yeeshaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Waaxda Arrimaha Qurbajoogta ayadoo loo sii marayo barnaamijyada iyo siyaasadaha lagula macaamilayo qurajoogta ee horumarinta Qaranka.

   Guddiga qurbajoogtu waa in aysan ka badnaan 6 ilaa 8 xubnood kuwaas oo ka kooban waddamada waaweyn ee ay ku nool yihiin qurbajoogta Soomaaliyeed.

Guddiga qurbajoogta sidoo kale waa in ay yeeshaan shir bille ah, ama saddexbiloodle ah.

2) In la siiyo qurbajoogta gunooyin lagu dhiirrigalinayo sida canshuur dhaaf alaabta iyo badeecadaha ay la soo degayaan taas oo noqon karta in lagu dhiirrigaliyo qurbajoogta si ay dalka u maalgashadaan.

3) Ilaalinta sharciyada degaanka si loo ilaaliyo maalgashiga qurbajoogta, sida daahfurnaanta, ganacsiga, iyo hoos- u- dhigidda khataraha ganacsiga soo wajihi kara.

4) Abuuridda ururro maalgaliya ganacsiyada yaryar, in la fududeeyo tabarrucaadda qurba joogta iyo maalgashiga ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe. Ganacsiyada yaryar waxay dhiirrigalinayaan hal-abuurka ganacsiga, sidoo kalana waxay awood siinayaan ganacsiyada gudaha si wax looga qabto saboolnimada waddama soo koraya. Arrintan waxaa tusaale u ah barnaamijka la dhaho **Haiti's Zafen Program,** barnaamijkaas oo ganacsiyo yaryar loogu abuuray 575 ganacsato yaryar kuna kacay qiimo lacageed oo dhan 1 Milyan oo doolar, sidoo kalana laga sameeyay 900 oo shaqa-abuur ah.

5) Waxaa la dhiirrigalinayaa danaynta qurbajoogta Soomaaliyeed ee dhinacyada sida beeraha iyo hal-abuurka ganacsiga, iyo iskaashiga u dhexeeya dowladda iyo qurbajoogta. Maalgalinta ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe waxaa abuuri kara Dowladda ayadoo maalgalinaysa, beeraha, ganacsiyo loo abuuro qurbajoogta. Xubnaha qurbajoogta waxay bah wadaag ganacsi la noqon karaan ganacsatada Soomaalida gudaha kuwaas oo hela; taageero ganacsi oo ay ku bilaabaan ganacsigooda, tababarro xirfadaha ganacsi, dabagalka iyo tababaridda xubanaha qurbajoogta.

6) In lagu dhiirrigaliyo hay'adaha ay khusayso si qurbajoogtu u maalgashato guryaha, miyiga iyo horumarada magaalooyinka.

4.3. Xogta iyo Warbixinta

Samaynta iyo hirgalinta Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta waxay u baahan tahay xog saxan oo waqtiga la socota. La'aanta xog saxan waxay caqabad ku noqon kartaa in qurbajoogta si hagaagsan loola macaamilo. Dowladdu waxay u baahnaan doontaa xog la isku hallayn karo oo waqtiga la socota si

loo ogaado, tirada, meelaha ay ku kala nool yihiin iyo khibradda dadka qurbajoogta ah, iyo sidoo kale, isbaddallada hayaanka joogta ah ee ay sameeyaan. Maadaama siyaasaddaan u baahan tahay fahan dheeraad ah iyo xaddi ballaaran, xogta iyo

warbixinta siyaasaddu waa in ay ku salaysan tahay xaqiiqada qurbajoogta ee dalkooda rasmiga ah. Tusaale ahaan in la la macaamilo jiilka labaad ee qurbajoogta Soomaalida Minnesota waxay u baahan tahay in loo fududeeyo sidii ay ku soo gudbin lahaayeen xirfadooda, halka Soomaalida Qurbajoogta ah ee kuu nool waddamada iskaashiga golaha waddamada Gacanka Carbeed ay u badan tahay inay u baahan yihiin in ay isticmaalaan taageerada dowladda si ay u sameeyaan heshiisyo labageesood ah oo shaqa-abuur u ah dadkii soo hayaamay.

1) Isku darka warbixinada qurbajoogta. In la hagaajiyo helitaan xog saxan oo lagu helo waqtigeeda kuna saabsan qurbajoogta Soomaalida waxay kor u qaadaysa la macaamilka qurbajoogta. Dowladda waxay horumarin doontaa hirgalinna doontaa madal lagu kaydiyo xogta qurbajoogta. Madasha xogta ee la soo jeediyay waxay mudnaanta siin doontaa dhinacyada hoos ku xusan;

B. Tirakoobka Qurbajoogta, waxay muhiim u tahay in la abuuro istiratijiyado lagu ogaanayo qurbajoogta sida; jinsigooda, da'dooda, khibraddooda, baahiyahooda, mudnaantooda, iyo rabitaankooda in ay qayb ka qaataan horumarada Qaranka.

T. Xog kaydiyaha ururrada qurbajoogta iyo saamilayda ugu muhiimsan, taas waxay caawin doontaa la macaamilka qurbajoogta, baahinta xogohooda, iyo sii wadidda xiriirka socda ee u dhexeeya qurbajoogta iyo Dowladda. Xogaha iyo xiriirka tignolojiyadda casriga ah waxay hagaajin karaan xiriirka wanaagsan ee la la yeelanayo qurbajoogta, ayadoo la abuurayo madal dhinaca khadka ah oo gaar u ah qurbajoogta.

J. Khibradaha qurbajoogta, dowladda waxay qeexi doontaa meelaha ay khibradda fiican u leeyihiin qurbajoogtu kuwaas oo loogu baahan yahay in horumar degdeg ah looga gaaro sida; culuumta Ingineerinka, maamulka, tignolojiyadda, dhaqaalaha iyo kuwo kale oo la mid ah. Waxaa muhiim noqon doona in la horumariyo hababb lagu aruurinayo looguna kuurgalayo xogta qurbajoogta.

X. In la soo koobo fursadaha maalgashi iyo kuwa ganacsi. Waxay muhiim u tahay dhinacyada dhaqaalaha, gobolada dalka ee la macaamila maalgashiga qurbajoogta. Waxaa muhiim ah sidoo kale, in hoosta laga xarriiqo guulaha ay qurbajoogtu gaartay si ay dhiirrigalin ugu noqoto in ay ka qaybqaataan maalgashiga.

KH. Awoodda xoogga bini'adamka ee maamulka xogta, si loo sii wado warbixinta saxan ee qurbajoogta. Dowladdu waxay u baahan doontaa shaqaale wax qabad leh si uu u soo uruuriyo una kaydiyo xogta, sidoo kalana u casriyeeyo heliddda xogta la xiriirta qurbajoogta ee dad weynuhu heli karo.

D.Casriyeynta xogta si joogta ah ama si kalle ah waa waxa looga baahan yahay xiriir fiican oo la la yeesho qurbajoogta iyo hirgalinta siyaasadda.

R. Adeegsiga iyo soobandhiggidda sheekooyinka guulaha ay gaareen qurbajoogta Soomaalida ilaa inta laga helayo nidaamxogeed rasmi ah. kaas oo dowladdu ay ugu oggolaanayso xubnaha qurbajoogta in ay uga qaybqaataan horumarinta dalka ayagoo u sii maraya, khibraddooda, aqoontooda iyo waaya-aragnimadooda.

4.4. BADBAADADA IYO AMNIGA

Nabadgalyadu waa mudnaanta koowaad ee barnaamijka dawladdu ay ku aqoonsanayso saamaynta ay ku yeelanayso muwaadiniinta gudaha, qurbajoogta, iyo dhaqaalaha waxayna horumarinaysaa oo ay taageeri doontaa tallaabooyinka lagu horumarinayo amniga iyo badbaadada dadka , badeecadaha, iyo kaabayaasha iyadoo la raacayo awaamiirta siyaasadeed ee soo socota.

1) In la aqoonsado daneeyayaasha loo baahan yahay inay iska kaashadaan si loo horumariyo siyaasad badbaado iyo nabadgelyo Qaran, taas oo ku dhici karta heer degaan iyo qurbojoogba, iyadoo la qaadanayo hab loo wada dhan yahay oo la xiriira hawlgelinta daneeyayaasha.
2) In golaha la talinta qurbajoogta la gala doodo siyaasadda qodobka koowaad ee kor ku xusan daneeyayaal ahaan iyo sida ay saamayn ugu yeelanayso ka qaybqaadashadooda horumarinta qaranka.
3) In la sameeyo istaraatiijiyado la isku weydaarsado macluumaadka ku saabsan faldambiyeedka caalamiga ah dhammaan wasaaradaha ay khusayso, hay'adaha dowladgoboleedyada iyo sidoo kale saaxiibbada horumarinta caalamiga ah.
4) In la sameeyo heshiisyo labageesood ah kuwaas oo ku qotoma wanaajinta iyo ilaalinta xuquuqaha shaqaalaha soogalootiga Soomaaliyeed ee dibedda u soo hayaamay, lana tayeeyo dariiqyada ama marinnada socdaalka joogtada ah, si looga qaybqaato yaraynta tahriibka aan joogtada ahayn, ka hortagga tahriibinta dadka, iyo ka faa'iidaysiga ama adeegsiga shaqaalaha Soomaalida.
5) In la sameeyo barnaamijyo waxbarasho dadweyne oo ku saabsan arrimaha amniga, si looga caawiyo xubnaha qurbajoogta dib-u-dejinta iyo dib ugu soo celinta Soomaaliya.
6) Xoojinta sharciga si loo fududeeyo maalgashiga, oo ay ku jiraan dhaqangalinta xeerarkii hore iyo dambiyada khadka intarneetka, lacagaha la dhaqay iyo dambiyada kale ee maaliyadeed.
7) Dhaqangalinta tababaridda shaqaalaha ee barnaamijyada xafiisyada diblumaasiyiinta si loo caawiyo xubnaha qurbajoogta ah ee soo hayaamay ee ku sugan dalalka martida

loo yahay, gaar ahaan kuwa nugul ee u baahan in laga caawiyo arrimaha badqabka ama badbaadada iyo ammaanka.

4.5. MUDNAANSIINTA HAWEENKA

Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) wuxuu xoogga saarayaa ujeeddooyinka barnaamijka ee diiradda saaraya kooxaha bulshada nugul iyo kuwa danyarta ah, iyadoo fiiro gaar ah looga baahan yahay awoodsiinta haweenka iyo gabdhaha. Maaddaama Dawladdu ay ku dadaalayso in ay samayso go'aanno siyaasadeed oo xog-ogaal ah oo laga soo xigtay xogta la kala saaray ee haweenka (gender-disaggregated data), arrimaha xasaasiga ah ee haweenka ee maamulka wuxuu u baahan yahay in kor looga qaado dhammaan dhinacyada jiritaanka Qaranka. Marka loo eego heer caalami, haweenka soogalootiga ah ayaa ah qabanqaabiyeyaasha bulshada ee muhiimka ah waxayna soo diraan lacago heer ahaan la mid ah tan hayaamayasha ragga ah inkasta oo ay helaan lacag yar. Lacagaha ay soo diraan inta badan waa kuwo soo noqnoqda muddo dheer. Marka la eego muhiimadda ay ku dhex leeyihiin bulshooyinka ay martida u yihiin, tixgalinta haweenka ayaa haddaba, muhiim u ah guusha siyaasadda qurbajoogta.

1. In lagu daro Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka siyaasad dejinta dheeraadka ah ee Qurbajoogta.

a). Wasaaraddu sidoo kale waa in ay hubisaa hirgelinta siyaasadaha xasaasiga ah ee haweenka iyo ka qaybgalka la xiriirka qurbajoogta.

b). Wasaaraddu waxay xaqiijin doontaa go'aan gaarista loo dhan yahay ee la xiriirta siyaasad sameynta.

2. In la hubiyo lana iswaafajiyo siyaasadda iyo la xiriirka qurbajoogta, shaqooyinka tirakoobka iyo barnaamijyada u gaarka ah qurbajoogta oo wata mabaadi'da sinnaanta labka iyo dhedigga ee lagu qeexay Qorshaha Horumarinta Qaranka, iyo sidoo kale Axdiga Haweenka Soomaaliyeed.
3. In si macno leh loola xiriiro ururrada haweenka ee qurbajoogta ah, isku xirka haweenka ayaa udubdhexaad u ah ururrada qurbajoogta iyada oo loo marayo kooxaha dhaqanka iyo diinta, iyo sidoo kale ururrada samafalka, kuwaas oo ka kooban adeegyada sharciga ilaa adeegyada istaageeridda sida taageeridda tacsida marka ay bulshada qayb ka mid ah ku timaado. Waa muhiim in ururradan lagu daro siyaasadaha axdiga haweenka si hagaagsanna ay uga qaybqaataan qurbajoogtu.
4. In la horumariyo lana fududeeyo barnaamijyo gaar u ah haweenka, gaar ahaan kuwa ku saabsan tababarka farsamada, taageerada horumarinta bulshada, maalgelinta

ganacsiga yaryar ee hal-abuurka haweenka, iyo adeegyada bulshada sida caafimaadka.

5. In laga faa'iidaysto ururrada haweenka qurbaha si kor loogu qaado horumarinta haweenka ee doorka hogaaminta, iyo sidii ay uga mid noqon lahaayeen uguna soo biiri lahaayeen miiska go'aan qaadashada ee golayaasha qaranka, taas oo muujinaysa ka go'naanta doorkooda Qorshaha Horumarinta Qaranka.
6. In la sameeyo barnaamijyo iskaashi iyo hagitaan u dhexeeya ururrada haweenka Soomaaliyeed ee gudaha iyo ururrada haweenka qurbaha, si kor loogu qaado awoodsiinta haweenka iyo xoojinta ururrada haweenka wax soo saara iyo ganacsiyadooda.
7. Xoojinta awoodda Waaxda Qurbajoogta ee falanqaynta axdiga haweenka iyo aaladaha loo isticmaalo kobcinta dhiiragalinta haweenka.

4.6. Dhallinyarada

Dhalinyaradu waxay ka mid tahay kuna qoran tahay Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) ee Soomaaliya inay tahay koox muhiim ah oo nugul, oo ay sidoo kale ka mid tahay dadka reer miyiga ah, haweenka, iyo dadka gudaha ku barakacay. Qurbajoogta ayaa ah kuwo is bedelaya, iyadoo tirada dadka Soomaaliyeed iyo kuwa ku dhashay meel ka baxsan Soomaaliya ay sii kordhayaan. Siyaasadaha iyo barnaamijyada qurbajoogta u gaarka ah dhallinyaradu waa in ay wax ka qabtaan laba qaybood oo muhiim u ah horumarinta Qaranka. kow: ballaarinta fursadaha dhaqaale bulsheed ee ay heli karaan dhallinyarada gudaha iyada loo marayo qurbajoogta, iyo ilaalinta xiriirka dhallinyarada ee dalkooda asalka ah ee Soomaaliya. Istiraatijiyadaha waxaa ka mida;

1. In la abuuro qaabkii ay dawladdu kula shaqayn lahayd dhalinyarada qurbajoogta ah.
2. In si macno leh loo la xiriiro ururrada dhallinyarada ee qurbajoogta. Ururrada ardayda Soomaaliyeed waxaa laga helaa machadyada dugsiga sare ka dambeeya oo ay deggan tahay qurbajoogtu. Marka laga soo tago ururradan, ardayda Soomaaliyeed waxay uga qaybgalaan nolosha ardayda iyagoo adeegsanaya diin, aragtida midnimada Afrika (Pan Africanism), iskaa wax-u-qabso, iyo ururrada ardayda xuquuqda madaniga ah. La shaqaynta kooxahan waxay ka caawin kartaa dhinacyada kale ee siyaasadda sida gudbinta raasamaal bini'aadameed, iyo sidoo kale isdhexgalka iyo soo noqoshada dalka ee qurbajoogta.
3. In la sameeyo hindisayaal lagu xiriirinayo laguna abaabulo da'yarta Soomaaliyeed ee gudaha shabakadaha qurbajoogta si loo hubiyo waxqabadka dhallinyarada qurbajoogta ah mustaqbalka fog, tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay maadaama jiilasha qurbajoogta ahi ay noqon doonaan kuwo aan ku mashquulin waddankii ay asal ahaan ka soo jeedeen. 4. In la abuuro barnaamijyo isku xira dhallinyarada qurbajoogta

ah iyo kuwa Soomaaliya jooga gaar ahaan barnaamijyo ku salaysan la talinta, tababaridda, iyo iskuxirka xirfadlayaasha dhallinyarada ah.

5. In la horumariyo waxsoo saarka dalxiiska iyo barnaamijyo dhaqameed si gaar ah loogu talagalay dhallinyarada gudaha iyo kuwa qurbaha.
6. In laga faa'ideysto baraha bulshada si kor loogu qaado dedaallada socda ee lagu hirgelinayo siyaasadda qurbajoogta.
7. Ka qayba galka kubadda cagta, barnaamijyada hormarinta ciyaaraha, maalgashiga iyo nabad dhisidda in ay noqdaan madal ay ka qayb galaan dhallinyaradu, dowladduna aqoonsan tahay.

4.7. Dalxiiska iyo Dhaqanka

Hilowga qurbajoogta ee dalkooda ayaa door muhiim ah ka ciyaara dalxiiska adduunka oo dhan iyadoo dalxiisayaasha qurbajoogtu ay guud ahaan aad u xiiseeyaan waxsoosaarka, adeegyada iyo degamada gudaha marka ay booqanayaan dalkooda hooyo. Intaa waxa dheer, astaanta qaranku waxa ay noqotay mid aad u baahsan, abuurta oo kor u qaadaysa muuqaal gaar ah iyo sumcad caalami ah oo u adeegaysa danta qaranka.

Runtii, wadamadu waxa ay dib u qaabaynayaan aqoonsigooda qaran iyaga oo tartan caalami ah ugu jira dalxiiska iyo maalgashiga gudaha.

Qurba joogta Soomaaliyeed waxay sidoo kale danaynayaan inay maalgashadaan suuqyada/adeegyada dalxiiska iyo dhaqanka si ay fursad u siiyaan dowladda inay ka faa'iideysato fursaddan. Mid ka mid ah siyaabaha ugu awoodda badan ee isku xirka madaxa iyo wadnaha xubnaha qurbajoogta waa booqashooyinka dalka hooyo. Waddamada adduunku hadda waxay qurbojoogtooda ku martiqaadayaan shirar ay dib ugu soo laabanayaan waddankii hooyo, iyaga oo kor u qaadaya booqashooyin habaysan oo waddankoodu ugu talagalay jiilka soo socda iyo soo jiidashada dalxiiska qurbajoogta.

Dawladdu waxay abuuri doontaa barnaamijyo gaar ah oo loogu talagalay dalxiiska iyo dhaqanka Qurbajoogta

1) Samaynta barnaamijyo iyo dhiirrigelin ururrada qurbajoogta ah iyo ergada diblumaasiyadeed ee waddamada loo aadayo si kor loogu qaado fursadaha dalxiiska Soomaaliyeed gaar ahaan soo bandhigidda fanka iyo dhaqanka Soomaaliyeed, iyo sidoo kale baridda luqadaha.

2) In la sameeyo barnaamij waxbarasho oo lagu casuumayo xubnaha qurbajoogta Soomaaliyeed ee jiilka labaad iyo saddexaad inay yimaadaan Soomaaliya, si ay wax uga bartaan hiddahooda, bulshadooda, iyo xiriirka dalkooda. Tani waxay sidoo kale dhiirrigelinaysaa dhallinyaradu inay qaadato door firfircoon si

ay u horumariso dalka hooyo. Waxaa isa soo taraya tirada dhallinyarada qurbaha ee u safra dalalkii ay ka soo jeedeen si ay jawaab ugu helaan aqoonsigooda iyo rajada ay ka qabaan in ay ku xirmaan dalkooda asalka ah. Qaar badan ayaa u arka waxbarashada, shaqada iyo barnaamijyada iskaa-wax-uqabso ee dibadda fursado ay ku abuuraan xiriir dhaqan, fahan fiicanna ay uga qaataan meeshii ay asal ahaan ka yimaadeen ayaga iyo qoysaskooda. Daraasad uu sameeyay 2010 machadka siyaasadda socdaalka ayaa lagu ogaaday in gudaha Mareykanka, soo galootiga ay 46% uga dhowdahay inay si mutadawacnimo ah ugu shaqaystaan caalamka marka loo eego muwaadiniinta Maraykanka u dhashay. Ku dhawaad hal milyan oo Maraykan ah oo si iskaa wax-u -qabso ah uga shaqeeya dibadda sannadkii, ku dhawaad 200,000 oo ka mida ayaa ah soogalootiga jiilka koowaad iyo labaad. Tusaale ahaan, Dhalashada Israa'iil waa ururka dalxiiska waxbarasho ee ugu weyn adduunka kaas oo siiyay in ka badan 800,000 safarro dhallinyarada qaangaarka ah ee Yuhuudda inta u dhaxaysa da'da 18-26 sanadkii.

3) In qurbajoogta loo soo bandhigo isdhaafsi barnaamijyo waxbarasho,ciyaar iyo dhaqan.
4) In la kordhiyo xiriirka ka dhexeeya wax soosaarka dhaqanka iyo dalxiiska Soomaaliya iyada oo loo marayo hoteellada iyo dalxiisayaasha, gaar ahaan iyadoo lala kaashanayo hay'adaha dhaqanka iyo dalxiiska ee Soomaaliya.
5) In la sameeyo barnaamijka Danjirayaasha Dalxiiska iyo Dhaqanka iyadoo laga faa'iidaysanayo xirfadaha, khibradaha iyo raasamaalka laga helayo qurbaha.
6) Kor u qaadidda dalxiiska degaanka si loo fududeeyo loona hirgaliyo ayadoo loo sii marayo barnaamijyada dhiirrigalinta ganacsiga.
7) Hirgelinta iyo taageeridda hindisayaasha ka hortagga dembiyada iyo dhimista si loo xaqiijiyo badbaadada iyo ammaanka dadka soo booqda dalka, oo ay ku jiraan qurbajoogta booqanaysa ama dib ugu soo laabtay Soomaaliya.

4.8. ISDHEXGALKA IYO KU SOO NOQOSHADA DALKA

Tiirarka asaasiga ah ee istaraatijiyadaha qurbajoogta caalamka waa in la dhiirrigeliyo ku noqoshada ku meel gaarka ah ama joogtada ah ee dalkii hooyo. laakiin gaar ahaan halka dalka dib-ugu-laabashada ay joogto tahay waxa muhiim ah in la fududeeyo oo la taageero dib ugu soo laabashada waddankii asalka ahaa. Intaa waxaa dheer, waxaa la xusay in ay jiraan daldaloollo dhinaca taageerada dadka soo laabtay inta lagu jiro dib-u-celinta - khasabka ah ee waddankoodii hooyo. Taageerada waxa bixiya dalka martida loo yahay si loo fududeeyo bixitaanka, laakiin taageerooyinka sida la talinta is dhexgalka, gargaarka caafimaadka dhimirka, si qurbajoogtu ugu noqoto dalkoodii asalka ahaa kuma filna. Tani waxay si gaar ah u khusaysaa dadka lagu xiray dalka ay martida u yihiin ee si qasab ahna lagu soo celiyay. Waxaa intaa dheer, waxaa jira caqabad ay la kulmeen dadka soo laabtay, taas oo ay ugu wacan tahay

sinnaan la'aanta awoodda ee laga dareemay dhinaca dadka deegaanka. Iyadoo la og yahay in guud ahaan caafimaadka iyo fayoobaanta xubnaha qurbajoogta ah ee soo laabanaya ay saameyn ku leedahay caafimaadkooda jireed iyo bulsho ahaaneed oo ay weheliso caafimaadka shucuureed iyo maskaxeed. Helitaanka xog taageeraysa adeegyada dalka waxay muhiim u tahay qurbajoogta si ay isku dhexgalaan bulshada ay ka soo jeedaan.

Dawladdu waxay qaadi doontaa tillaabooyinka soo socoda iyadoo la kaashanaysa bahwadaagteeda:

1. In la sameeyo barnaamijyo lagu dhexgelinayo dadka ku soo laabanaya gudaha dalka iyo bulshada gudaha. In la sameeyo wadashaqeyn dhexmarta wasaaradaha iyo xarumaha qurbajoogta halkaas oo dadka soo laabanaya (foggaan-arag ahaan iyo xarun ahaanba) ay ka heli karaan macluumaadka lagama maarmaanka ah ama kaalmo wax ku ool ah oo ku saabsan hababka is dhexgalka bulshada.
2. In la siiyo barnaamijyo isdhexgalka dadka lagu khasbay inay dalka ku soo laabtaan, sida la talinta is dhexgalka, kaalmada caafimaadka dhimirka, iyo barnaamijyo tababar.
3. In la siiyo kalfadhiyo hanuunin ah oo loogu talagalay dadka soo laabtay si looga hortago caqabadaha ganacsigooda, iyo sidoo kale dhaleecaynta qurbajoogta laga sheego.
4. Abaabulka munaasabado si looga caawiyo dadka soo laabanaya inay degaan. Dhacdooyinkani waxay sidoo kale bixin doonaan fursado isku xiran oo qiimo leh.
5. Iskudubarridka iskaashiga guud iyo kuwa gaarka ah ee hay'adaha qurbajoogta si loo fududeeyo is dhexgalka Soomaalida soo laabanaysa iyo kuwa la soo celinayo taas oo ay fulinteeda leedahay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

4.9. CAAFIMAADKA

Dowladda Soomaaliya ayaa u aqoonsatay daryeelka caafimaadka aasaasiga ah in uu yahay habka ugu muhiimsan ee lagu wanaajinayo natiijooyinka caafimaadka, iyadoo daryeelka caafimaadka guud ahaan iyo midka caalamiga ah uu yahay hadafka Dowladda. Qurbajoogta ayaa horay u ahaa xubin muhiim u ah caafimaadka Soomaaliya, iyagoo gacan ka gaysta horumarinta siyaasadda, bixinta adeegyada caafimaadka ee dadka nugul, waxaana ugu dambeeyay, in qurbajoogtu ka qaybqaadatay wajiyada kala

duwan ee wax ka qabashada cudurka COVID-19. Barnaamijyada xiriirka qurba joogta waa in ay dhisaan oo ay ballaariyaan doorka jira ee Soomaalida dibaddu ay ka ciyaaraan caafimaadka.

1. In lala shaqeeyo kooxaha qurbajoogta iyo khubarada si loo hubiyo in macluumaadka caafimaadka la heli karo, dhaqan ahaan, lab iyo dhedig iyo da' ahaanba, loona qaabeeyay si ay muwaadiniintu u fahmaan. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka bulshada sida COVID-19 iyo kooxaha nugul (haweenka, dhalinyarada, bulshooyinka reer miyiga) kuwaas oo la tacaalaya helid la'aan adeeg caafimaad oo ku filan .
2. In laga caawiyo ururrada iyo shabakadaha qurbajoogta adeegyada caafimaadka iyo deeqaha qalabka caafimaadka ee muhiimka ah. Ka saaridda caqabadaha sharciyeynta si loo kordhiyo ka jawaabista baahiyaha caafimaad ee deegaanka.
3. In la fududeeyo iskuxirka golayaasha siyaasadda iyo xirfadlayaasha caafimaadka ee qurba joogta Soomaaliyeed.
4. Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay awood u yeelataa bulshada qurbajoogta ah iyo ururrada diinta si loo xaqiijiyo helitaanka qaadashada tallaalka dadkaas Wadamada asal ahaan ka soo jeedaan qurba joogtu sida Soomaaliya waa in ay aqoonsadaan doorka muhiimka ah ee qurbajoogta iyo hagaagsanaanta muwaadiniintooda.
5. In la sameeyo barnaamijyo aqoonkororsi ah oo lagu xoojinayo taageerada daryeelka caafimaadka si loo taageero qurbajoogta shaqada ugu soo hayaantay waddamada kale. Hawlwadeennada diblamaasiyaddu waa inay awoodaan inay bixiyaan xogta caafimaad ee maskax ahaan, jinsi ahaan iyo taran ahaan ee haweenka soo hayaamay sida waddamada Golaha Iskaashiga Gacanka Carbeed (GCC).



Jaantuska 2aad waddamada marti galiya aqoonyahanka qurba joogta waxay ka qayb qaataan barnaamijyada lagu hormarinayo qurba joogta Afrika, waddama kale ee aqoonyahanka Qurba joogta waxaa ka mida; Norway, Germany, Belgium, Ethiopia, Uganda iyo New Zealand. 26

Xogta IOM

Dhakhaatiirta Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool ayaa Soomaaliya la wadaagay khibraddooda iyo aqoontooda ku saabsan tignoolajiyadda casriga ah iyo habraacyada ilaalinta COVID-19. Waxa ay khadka ka sameeyeen xiisado tababar si kor loogu qaado tayada shaqaalaha maxalliga ah ee isbitaalada guud iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Dhaqaatiirtu waxa ay ballan qaadeen in ay bixinayaan kharashaadka xarumaha caafimaadka ee guurguura si ay u gaaraan meelaha fog fog. Intaa waxaa dheer, qurbojoogtu waxay sii wadaan taageerada waaxda caafimaadka ee Soomaaliya iyagoo u maraya barnaamijyo sida **Barnaamijka Horumarinta Qurbajoogta Afrika** ee hay'adda Socdaalka Adduunka (IOM MIDA). Barnaamijka MIDA ee Soomaaliya waxa uu hubinayaa in xirfadaha iyo aqoonta lagu wareejiyo hay'adaha martida loo yahay oo ay sii hayaan shaqaalaha qaranku marka ay khubarada qurbajoogtu dhammeeyaan hawlahooda. Saamaynta muddada dheer iyo sii jiritaanku waa la sii xoojiyaa iyada oo loo marayo shaqooyinka xirfadlayaasha maxalliga ah iyo kuwa yaryar, kuwaas oo ka faa'iideysanaya la talinta iyo tababarka maalin laha ah ee khubarada qurbajoogta. Qurbajoogta Soomaaliyeed ayaa laga kala keenay dalal dhowr ah sida ku cad sawirka 2aad.

4.10. Waxbarashada


Waxbarashadu sidoo kale waa qayb muhiim u ah horumarinta qaranka halka qurbajoogtu ay ku hawlan yihiin dhaqan ahaan. Qorshaha Horumarinta Qaranka ayaa qeexay in xoojinta maamulka nidaamka waxbarashada Soomaaliya, tayada hay'adaha Wasaaradda, guddiyada waxbarashada, iyo u hoggaansanaanta shuruucda hay'adaha gaarka ah ay leeyihiin mudnaan gaar ah. Istiraatijiyadda ama xeeladaha la macaamilka qurbajoogta waxaa ka mid ah;

1. In kooxaha qurbajoogta ay ka qaybqaataan hindisayaasha dawladda ee Qorshaha Hormarinta Qaranka (NDP) ee loogu talagalay dadka aadka u nugul heerka diiwaangelinta hoose ee dugsiyada hoose/dhexe iyo sare, gaar ahaan gabdhaha iyo dadka meelaha miyiga ah jooga iyo sidoo kale kaabayaasha dugsiyada, iyo nadaafadda.
2. In la abuuro barnaamijyo tababar oo la la kaashanayo saaxiibbada bahwadaagta caalamiga ah ee qurbajoogta korna loogu qaado xirfadaha macallimiinta heer kasta dugsiyada, gaar ahaan macallimiinta haweenka si kor loogu qaado tirada haweenka iska diiwaangalinaya dugsiyada.
3. Fududaynta fursadaha iskuxirka iyo madasha siyaasadeed ee xubnaha qurbajoogta ee xagga tacliinta, maamulka waxbarashada, tababarrada

   xirfadaha iyo hay'adaha shaqaalaysiinta si ay uga faa'iidaystaan dhinaca waxbarashada.
4. In la iswaafajiyo habaynta barnaamijyada haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka qaba iyo barnaamijyada dhallinyarada ee ka soo baxaya siyaasaddan ka qaybgalka qurbajoogta iyo dhinacyada waxbarashada.

5. **GABAGABO**

a. MUDNAANTA SIYAASADDA MUDDADA GAABAN



5.1.1 Samaynta iyo Xoojinta Xiriirka Qurbajoogta

Marxaladda ugu horreysa ee hirgelinta siyaasaddan, Dowladda Federalka Soomaaliya waxay xoogga saari doontaa horumarinta xiriirka iyo iskaashiga bulsho weynta Soomaaliyeed ee qurbaha. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in dhidibada loo aaso ka qaybgalka wanaagsan ee qurbajoogta, dhinacyada kala duwan, si loo gaaro himilooyinka mustaqbalka fog ee siyaasaddan.



5.1.2 Qeexidda Shabakadaha, Kooxaha iyo Ururrada

Mid ka mid ah hawlaha ugu muhiimsan ee siyaasaddan waxaa ka mid ah samaynta khariidad dhammaystiran si loo helo shabakadaha qurbjoogta ah ee jira, oo ay ku jiraan xirfadlayaasha, haweenka, dhallinyarada, kooxaha iyo ururrada kale ee la aasaasay. Mudnaanta ayaa la siin doonaa samaynta diiwaangalinta hay'adahan.



5.1.3 Istaraatiijiyad Isgaarsiineed oo Wax-ku-ool ah

Dowladda Federalka Soomaaliya waxay qiimayn ku samayn doontaa habab is gaarsiineed oo kaladuwan oo jira si ay awood ugu yeelato isdhexgalka bulsho weynta Soomaaliyeed ee qurbajoogta ah iyo inay go'aamiso hannaanka ugu habboon ee

lagu gaari karo dadka dhagaystayasha ah. Qiimayn taxaddar leh ayaa lagu xisaabtami doonaa.



5.1.4 Qeexidda Qaybaha Muhiimka ah ee Iskaashiga

Marka la eego awoodda ay u leeyihiin bulshada qurbajoogta ah in ay fuliyaan qaabdhismeed sax ah, Dowladda Federalka Soomaaliya waxay si taxaddar leh u xulan doontaa meelaha muhiimka ah ee Qorshaha Horumarinta Qaranka si ay si istiraatijiyad ahna ula falgalaan qurbajoogta oo ay sare ugu qaadaan waxqabadkooda.

5.1.5 Baahinta Siyaasadda



Si loo ilaaliyo waxyaabaha siyaasaddu khusayso Dowladda Federalka Soomaaliya waxay u sahlaysaa qurbajoogta iyo waaxyaha dowladda inay:

a). ka warqabaan jiritaanka siyaasaddan

b) Si joogto ah ula socdaan sidii loo hirgelin lahaa,

loona gaaro dadka loogu talagalay, siyaasaddani waxay u baahan tahay in kor loo qaado.

5.2 MUDNAANTA SIYAASADDA MUDDADA DHEER

5.2.1 Maalgashiga Tooska ah ee Qurbajoogta

Haddii si wanaagsan loo abaabulo, maalgashiga qurbajoogtu waxa ay u adeegi karaan dib-u-cusboonaysiinta iyo soo kabashada Soomaaliya. Qurbajoogta ku nool dalalka ay martida u yihiin waa in lala socodsiiyaa fursadaha maalgashi ee Soomaaliya ayadoo loo sii marayo safaaradaha dalku ku leeyahay dibadda. Si loo horumariyo maalgashiga qurbajoogta ee fudud, Dowladda Federalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah waxay hubin doonaan inay jiraan habab saaxiibtinimo. Fikradda ay soo jeediyeen qaar ka mid ah dowladgoboleedyadu ayaa ah in, xaaladaha qaarkood, ay u dhaqmaan sidii deeqbixiye.

Marka qof qurbojoog ahi uu maalgalin ka sameeyo dowladgoboleedyada, waa la soo dhawaynayaa waxayna dhiirrigelin doontaa qaar badan inay ku soo biiraan.

5.2.2 Hababka Isgaarsiinta

Qodobkani waxa uu lamahuraan u yahay ka dhigidda siyaasadda mid shaqaynaysa. Abuuritaanka iyo naqshadaynta madal ku habboonna waa lagamamaarmaan. Inkasta oo ay caddahay in baraha bulshada laga faa'iidaysan karo, haddana Dowladda Federalka Soomaaliya waxay yeelanaysaa hab u gaar ah oo ay kula xiriirto qurbajoogta.

sameeyayasha siyaasaddan waxay ku taliyeen in la dhiso hab isgaarsiin qurbojoogtu leedahay oo kumeelgaar ah kaas oo la mid ah mareegaha MFA si loo sii wado dardargelinta. Si xogta looga dhigo mid la heli karo, Dowladda Federalka Soomaaliya waxa ay qorshaynaysaa in ay dhisto xog uruurin iyo kaabayaal xog ururin.

5.2.3 Gudbinta Waxbarashada

Arrintani waa qayb muhiim ah oo ka mid ah siyaasadda, sababta oo ah waxaa jira qurbojoog Soomaaliyeed oo aqoon leh oo ku nool dibadda. DFS waxay xoogga saari doontaa sidii qurbajoogta Soomaaliyeed ee wax bartay loogu fududayn lahaa inay aqoontooda u gudbiyaan dadka kale ee Soomaaliyeed ee u baahan. Xataa barayaasha shaqada ka fariistay DFS waxay siin doontaa dhiirigelin iyo taageero ay ku yimaadaan Soomaaliya xataa waqti kooban. Xogta la qorsheeyay ayaa sidoo kale la socon doonta aqoonyahannada, taas oo u sahlaysa DFS inay la jaanqaado aqoon yahanada jooga iyo baahiyaha jira. DFS waxay ku boorrin doontaa Safaaradaha inay la xiriiraan qurbajoogta Soomaaliyeed ee wax bartay, kuna dhiirrigeliso inay caawiyaan Soomaalida u baahan aqoontooda.

5.2.4 Gudbinta Xirfadda

Xirfadda gudbintu waa hab si weyn loo aqoonsan yahay oo wax looga qabanayo baahida xirfadeed ee ka jirta waddan sida Soomaaliya oo kale ah oo baahi weyn loo qabo xirfado gaar ah. Iyada oo loo marayo siyaasaddan, DFS iyo qaar ka mid ah dowladaha xubnaha ka ah ayaa dhiirrigelin u fidiyay qof kasta oo qurbajoog Soomaaliyeed ah oo bixiya tababarro xirfadeed haba yaraatee. Dhallinyarada shaqo la'aanta ah ayaa sida ugu badan uga faa'iidaysan doona qorshayaasha gudbinta xirfadda, FGS iyo FMS waxay hubin doonaan hagaajinta qalabka si ay si habsamida leh ugu fududeeyan hindisahan. Tusaale ahaan, muddada wadatashiga siyaasaddan, dowladgoboleedyada qaarkood waxay si cad u sheegeen dhiirrigelinta ay dowladgoboleedyadu siin doonaan qof kasta oo tababara dhallinyaradooda aan xirfadda lahayn iyo kuwa shaqo la'aanta ah.

5.2.5 Ganacsiga iyo Dalxiiska.

Soomaaliya waxaa si cad uga jira goobo ku wanaagsan dalxiiska inkasta oo ay jirto xaalad amni. Siyaasaddani waxay dhiirrigelinaysaa qurbajoogta Soomaaliyeed inay soo booqdaan Soomaaliya. Dadka qaar ee qurbaha ka yimid ayaa laga yaabaa inay u safraan Soomaaliya marka ay hal kaas ka dhacayaan ay halkaas ka dhacayaan munaasabado dhaqameedyo guud . Qurbajoogta Soomaaliyeed waxay u shaqayn karaan sidii danjirayaal awood leh waxayna u abuuri karaan Soomaaliya fursado waaweyn iyagoo ka qayb galaya bandhigyada ganacsi ee dalalka ay martida u yihiin iyo, marka ay ku habboon tahay in ay kor u qaadaan badeecadaha Soomaaliya. Jaaliyadaha

Soomaalida ee qurbajoogta ah ee is abaabulay waxay awoodaan inay guulo fiican gaaran sida laga arkay dalalka Hindiya, Israa'iil, Marooko, iyo Ruwaanda oo hirgaliyay siyaasaddooda qurba joogta.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.29.04.23 ee 27/04/2023,** kuna saabsan ansixinta Xeerka "**Ku Biirista Aaga Ganacsiga Xorta ah ee Dalalka Carbeed**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.29.04.23 ee 27/04/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Ku Biirista Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Dalalka Carabeed,** waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, ahna Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-066-2023
TAARIIKH: 03-05-2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gorle
Hantidhawraha Guud ee Xafiiska

Mudane, Saalax Axmed Laamaac
Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, ahna Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.127 **Tariikh: 11/05/2023**

XEERKA: QARAARKA ADKAYNTA HUFNAANTA MAAMULKA IYO MAARAYNTA MAALIYADDA DALKA

XRW - BIXID
11 MAY 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (e) iyo (f) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka ee tirsigiisu yahay **22** soona baxay **9 Agoosto 2016.**

Markuu arkay: Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee tirsigiisu yahay **17** soona baxay **25ka Diseembar 2019.**

Markuu arkay: Sharciga Maamulka Dakhliga ee tirsigiisu yahay 7 soona baxay **Oktoobar 2019.**

Markuu arkay: Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dowladda **Lr. 11** ee soo baxay **5ta Diseember 2006.**

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.31.05.23 ee 11/05/2023,** kuna saabsan ansixinta **Adkaynta Hufnaanta Maamulka iyo Maaraynta Maaliyadda Dalka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leedahay ilaalinta hantida guud ee dadweynaha iyo in loo maareeyo si hufan oo u adeegaysa danaha guud ee dadweynaha;

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.31.05.23** ee **11/05/2023,** kuna saabsan ansixinta **Qaraarka Adkaynta Hufnaanta Maamulka iyo Maaraynta Maaliyadda Dalka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

1. Waxaa la farayaa dhammaan Wasaaradaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Hay'adaha kale ee Dowladda in ay si habsami leh u fuliyaan tallaabooyinka lagu dhaqangelinayo, laguna adkaynayo dhammaan shuruucda dalka gaar ahaan sharciyada iyo xeer-nidaamiyeyaasha khuseeya:

   B. Maaraynta Maaliyadda Guud ee Dalka.

   T. Maaraynta Dakhliga Dalka.

   J. Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

   X. Maaraynta Hantida Guud ee Qaranka.

   Kh. Maamulka iyo Maaraynta Shaqaalaha.

2. Dhammaan howlaha la xiriira iibka iyo qandaraasyada Qaranka waxaa lagu bixinayaa tartan furan oo habraacyadiisu cad yihiin si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.
3. Dhammaan qandaraasyada ay galayaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda waxaa ansixinaya Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Qandaraas-bixinta (dib-u-eegis soddon cisho gudahood ah) si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.
4. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Qandaraas-bixinta wuxuu soo saarayaa habraacyo fulineed oo khuseeya howlaha iibka iyo qandaraasyada Qaranka si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

5. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Qandaraas-bixinta waxa uu hirgelinayaa mareeg Xukuumadeed oo lagu daabacayo xogaha iyo macluumaadka ku saabsan qandaraas-bixinta iyo qandaraasyada dhaqangalka ah.
6. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Qandaraas-bixinta wuxuu dib-u-eegis ku samaynayaa dhammaan qandaraasyada dhaqangalka ah si loo hubiyo waafaqsanaantooda sharciyada iyo xeerarka khuseeya.
7. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Qandaraas-bixinta waxa uu yeelanayaa xoghayn farsamo oo ku kaalmaysa xilgudashadiisa gudigaas oo uu magacaabayo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.
8. Waxaa reebban in howlaha la xiriira iibka iyo qandaraasyada loo fuliyo hab aan waafaqsanayn Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.
9. Wasiirka Maaliyadda ayaa u xilsaaran xaqiijinta u hoggaansamidda iyo ku dhaqanka sharciyada ku xusan qodobkaan iyo xeer-nidaamiyeyaashooda.

Qodobka 3aad

Waxaa la farayaa Wasaaradda Maaliyadda in ay si dhaqsiyo leh u soo diyaariso Hindise Sharciyeedka Hantidhowrka Qaranka kaas oo horumarinaya isla-xisaabtanka iyo daahfurnaan ku aaddan maaraynta maaliyadda dalka iyo hantida dadweynaha una soo gudbiso Golaha Wasiirada si loo horgeeyo Barlamaanka Federaalka Soomaaliya inta lagu gudajiro kalfadhiga 3aad ee furmaya bisha Maajo 2023 gudaheeda.

Qodobka 4aad

Waxaa la farayaa Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka in ay si dhaqsiyo leh u soo diyaariso Hindise-sharciyeed u fududaynaya dadweynaha in ay soo wargeliyaan falalka lidka ku ah hufnaanta iyo fal dambiyeedyada la xiriira arrimaha maaliyadda iyo ku takrifalka hantida dadweynaha isla markaana ilaalinaya xuquuqdooda, una soo gudbiso Golaha Wasiirada si loo horgeeyo Barlamaanka Federaalka Soomaaliya inta lagu gudajiro kalfadhiga 3aad ee furmaya bisha Maajo 2023 gudaheeda.

Qodobka 5aad

1. Dhammaan Wasiirrada Xukuumadda Federaalka, Madaxda, Saraakiisha sare, Xoghayeyaasha Joogtada ah, Agaasimayaasha heerarka kala duwan ee

Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dowladda, waxay marayaan dhaar ku saabsan in ay si hufan oo daacadnimo leh u maaraynayaan hantida dadweynaha una gudanayaan xilkooda.

2. Xubnaha ku sheeggan faqradda kowaad ee qodobkaan waxay caddeynayaan hantidooda kana diiwaangelinayaan Xafiiska Hanti Dhawraha marka ay la wareegayaan mas'uuliyaadkooda iyo marka ay ka tagayaan.

Qodobka 6aad

Waxaa la dhisayaa guddi soo diyaariya hannaan ku salaysan daahfurnaan iyo howlkarnimo kaasi oo lagu fulinayo qaadashada dad karti u leh una qalma qabashada xilalka kala duwan ee dowladda Federaalka.

Qodobka 7aad

Waxaa la farayaa dhammaan hay'adaha u xilsaaran isla xisaabtanka, baarista iyo maxkamadaynta dambiyada la xiriira maaliyadda iyo hantida dadweynaha in ay dardargeliyaan xilgudashadooda ku aaddan ilaalinta hantida dadweynaha si waafaqsan sharciyada khuseeya.

Qodobka 8aad

Xeerka Qaraarka Adkaynta Hufnaanta Maamulka iyo Maaraynta Maaliyadda Dalka waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN-067-23
TAARIIKH : 23-05-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Issa Gu...
Hantidhawrahe Guud ee Dar...

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Tariikh: 11/05/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.128

XEERKA: SIYAASADDA HAWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA DOWLADDA.

XRW - BIXIT
13 MAY 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.31.05.23 ee 11/05/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leedahay in la meel-mariyo Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.31.05.23 ee 11/05/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada loo igmaday fulinta iyo meel-marinta Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

Qodobka 3aad

Xeerka Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO : HAN-068-23
TAARIIKH : 23-05-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA

SIYAASADDA HAWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA DAWLADDA

MUQDISHO -- SOOMAALIYA

2021

TUSMO

XARFAHA LASOO GAABIYEY & QEEXITAANADA MUHIIMKA AH .. **ERROR! BOOKMARK NOT DEFINED.**

MAHADNAQ ..... 4 YOOLKA

GUUD EE SIYAASADDA 5

1. HORDHAC..... 6 2. UJEEDKA SIYAASADDAN ..... 8 3. HADAFYADA GAARKA AH EE SIYAASADDAN WAA IN: ..... 8 5. SOO JEEDINTA SIYAASADDAN ..... 9 6. HANNAANKA DIYAARINTA SIYAASADDA HAWLGABKA 10
7. NOOCA HAWLGABKA, XADIGGA QAARAANKA & FAA'IIDADA DARYEELKA 10
8. MAAREYNTA & MAAMULKA SANDUUQA HAWLGABKA 11
9. SIYAASADDA MARXALADDA KALA GUURKA EE QAANTA ADEEGII HORE 12
10. KHARASHKA HIRGELINTA SIYAASADDA HAWLGABKA 12
11. XEYNDAABKA/QAABKA HIRGELINTA (IMPLEMENTATION FRAMEWORK) 13
12. DIBU EEGISTA SIYAASADDAN ..... 14 13. DHAQANGALKA SIYAASADAN ..... 14 14. Lifaaqa howl-qabadka Siyaasadda 15

Xarfaha Lasoo Gaabiyey & qeexitaanada muhiimka ah

DFS	Dawladda Federaalka Soomaaliya
XRW	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha
WSHAB	Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada
GQSHR	Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka Dawladda

Qorshe darveel hawlgab caviman (a defined benefit pension plan)	Waa qorhse darveel hawlgab caviman oo geexaya darveelka uu helayo hawlgabaha oo ku saleysan mudada uu usoo shageynayey dawladda iyo mushaarka uu helay
Hagbad (Pay As You Go)	Waa nooca qorshe ogolaanayo in qaaraanka la aruurivo lagu bixiyo darveelka hawlgabaha/hawlgabyaasha markaas taagan
Guddiga Kor-joogteynta hawlgabka iyo Liiltirka shaqaalaha rayidka ee dawladda	Guddiga loo dhisayo inay galaan ayna kor joogteeyaan sanduuga darveelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha

MAHADNAQ

Anigoo ku hadlaya magaca Wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada (WSHAB) ee Dawladda Federaalka Soomaaliaya (DFS) waxaan jeclahay inaan si xeeldheer uga mahadceliyo Bangiga Aduunka (World Bank), hawlwadeenada Mashruuca Tayeynta Hay'adaha iyo Shaqaalaha dawladda (Somalia Capacity Injection Project) iyo qubaradii sida wadajirka ah taageero maaliyadeed iyo mid farsamaba uga geystay diyaarinta siyaasadan.

Waxaan sidaa si lamid ah aanan la ilaabi Karin kaalintii mugga laheyd ee aqoon iyo waayo aragnimaba ku dheehneyd ee ay ka geysteen Guddigii Farsamo oo ka koobnaa xubno kala duwan oo laga soo xulay: Wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada,

Gudigga Qaranka Shaqaalaha Rayidka, Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Qorsheynta, Machadaka Tababarada Sahaqaalaha dawladda iyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo si dhaw ula shaqeynayey qabiirkii soo diyaariyey siyaasaddan iyo waliba qubaradii Bangiga Aduunka (World Bank) si loo helo siyaasadan baahida aadka ah loo qabay.

Waxaa kale oo aan u mahadnaqayaa dhammaan cid kasta oo si toos ah iyo si dadbanba gacan uga geystay soo diyaarinta siyaasadan.

Md. Duraan Axmed faarax

Wasiirka Wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada, Dawladda Federaalka Soomaaliya.

YOOLKA GUUD EE SIYAASADDA

“Yoolka guud ee siyaasadda hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka ee DFS waa in la helo, la xaqiijiyo lana siiyo shaqaalaha rayidka dawladda daryeel hawlgab iyo liiltir sugan oo ku haboon shaqaala rayidka dawladda kaasoo ah mid la joogteynkaro”

1. Hordhac

Taariikh ahaan, DFS waxay ku shaqyn jirtay **Qorshe Daryeel hawlgab Cayiman**, (a funded defined benefit pension plan) sida uu dhigayo Sharci L. 5 ee 31ka Diseember 1969, kaasoo dhaqan-galay 1dii Janaayo 1970. Sida dalal badan oo ka hooseeya lamadegaanka (saharaha) Afrika, DFS Soomaaliya gummaystihii Talyaaniga ayay ka dhaxashay nooca **Qorshaha Daryeel hawlgab Cayiman**. Qorshaas wuxuu bixinayey: dareyeel hawlgab iyo liiltir, daryeel naafanimo iyo daryeelka qoyska hawlgabaha markii ay ku timaado geeri. Qorshahaas waxay shaqaaluhu ku tabaruci jireen 6% mushaarkooda taasoo dawladdu ku dari jirtay lacag u dhiganta 4% mushaarkooda asaasiga ah. Qorshahaas hawlgabku wuxuu burburay xiligii ay burburtay dawladii dhexe ee 1991, waxaana lumay dhamaan diiwaannadii ka-faa'iidaystayaasha iyo maal-galintii la sameeyay.

31kii Diseember 1969 dii waxaa la sameeyey sharci L.6 oo ah sharciga hawlgabka iyo liiltirka ciidaamada qalabka sida iyo kuwa ciidan ahaan u habeysan kaasoo dhaqan galay 1dii Janaayo 1970. Sida sharcigan L.6 loo qaabeeyey waxay la mid aheyd sida loo qaabeeyey sharciga L.5 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqalaaha rayidka ee dawladda, hase yeeshee waxay ku kala duwnaayeen xadigga ama saamiga qaaraanka iyo waliba da'da hawlgabka.

Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada (WSHAB) ee dawladda Federaalka Soomaaliya markay aragtay baahida weyn ee loo qabo in loogu helo daryeel hawlgab iyo liiltir shaqaalaha rayidka ee dawladda, ayaa iyada oo kaashaneysa mashruuca tayogelinta & dibu-habenyta hay'daha iyo shaqaalaha rayidka dawladda (Somali Capacity Injection Project) ee uu gacanta ka gaystay Bangiga Aduunka, waxay diyaarisay soona jeedinaysaa Siyaasaddan Hawlagabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda.

Siyaasaddan hawlgabka waxay ku saleysantahay **Qorshe Daryeel hawlgab Cayiman** (a defined benefit pension plan) gaar ahaan nooca loo yaqaano **"Pay As You Go Scheme"** afka soomaaligana ku noqonkara **"Hagbad"** oo macnaheedu yahay "Qorshe ogolaanayo in qaaraanka la aruuriyo lagu bixiyo daryeelka hawlgabaha/hawlgabayaasha markaas taagan"**.** Qorshahan hawlgabka wuxuu la mid yahay qorshihii sharci L.5 1969 kaasoo dhaqangalay 1dii Janaayo 1970.

Go'aanka in la qaato nooca qorshahan hawlgabka lasoo jeediyey ee sare ku xusan, oo u muuqda nooca xulasho ku haboon, oo la joogteyn karo si fududna ay u hirgelin karto

DFS mustaqbalka dhaw, ayaa waxaa laga soo dhiraandhiriyey talooyin lagu soo jeediyey warbixin farsamo oo laga diyaariyey kuna wajahneyd sidii DFS ugu heli laheyd shaqaalaha rayidka xulasho qorshe daryeel hawlgab iyo liiltir ku haboon, taa soo si wadajir ah Guddiga Farsamada ee ay hogaaminaysay WSHAB ee DFS iyo kubaro ka socotay Bangiga Aduunka (World Bank) iyo dhamaan hay'daha kale ee dawladda oo ay khuseysayba ay ka gaysteen talooyin wax ku ool ah.

Hadda ma jiro sharci hawlgab ah oo u shaqaynaya shaqaalaha rayidka DFS kaasoo siinayana daryeel hawlgab iyo liiltir inkastoo la sameeyey dadaalo oo ay dawladdu ku doonaysay soo noolaynta qorshahii hore ee daryeelka shaqaalaha rayidka, hadana ma noqon mid guulaysta maadaama aanay jirin dhaqaale lagu fuliyo qorshihii hore. Abaabulka khayraadka oo hooseeya iyo dhaqaalaha dawladda oo aan hormarsaneyn ayaa dakhliga soo gala dawladda waxaa loo isticmaalaa kharashaadka hawl fulinta dawladda.

Maqnaanshaha siyaasad hawlgabka shaqaalaha rayidka iyo sharci jaangoynaya qorshaha hawlgab iyo liiltirka waxay dawladda iyo shaqaalaha rayidka ee hawlgabay ku qasabtay inay shaqada ku sii jiraan xataa marka ay dhaafaan da'da hawlgabka, maadaama aysan heli Karin dhaqaale kale oo ay u baxsadaan markay ka fariistaan ama ka tagaan shaqada DFS.

Burburkii dawladda ee 1991 oo galaaftay diwaanadii qorshahii hawlgabka iyo hantidiisiiba waa arin ay dawladdu ku baraarugsantahay, waxayna u darban tahay iska ilaalinta wixii cilado ah ee uu lahaa qorshihii daryeelka hawlgabka iyo liiltirak ee Sharci L. 5 ee 1969. Ayaa siyaasadani waxay soo jeedinaysaa in DFS sameyso Guddi soo baara soona hubiya warbixina kasoo siiya dawladda inay jiraan wax diiwaano ama hanti ah oo la heli karo ama la raadraaci karo ee uu lahaa qorshihii hore ee hawgabka.

Mar haddii ay hadda dakhli ururintii iyo miisaaniyaddii dawladdu dib usoo hagaagayso ayna jiraan dadaalo lagu xoojinayo amniga iyo dibu habeynta maamulka guud ee hay'daha iyo shaqaalaha rayidka dawladda, waxaa dawladda ka go'an inay hirgaliso siyaasad iyo Sharci hawlgab si shaqaalaha rayidka dawladda u helaan qorshe daryeel oo la joogteyn karo kuna haboon xiliga hawlgabnimada.

Siyaasadan Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka waxay dawladda u suurta galinaysaa inay dib u asaasto barnaamijka daryeelka shaqaalaha rayidka dawladda iyadoo waxa ka badal iyo casriyeyn lagu sameynayo sharci L.5 ee 1969 kaasoo loo soo gudbin doono golaha wasiirada kadibna loo gudbin doono baarlamaanka si uu u ansixiyo.

2. Ujeedka Siyaasaddan

Siyaasaddan waxay ka duulaysaa baahida loo qabo nidaam isku-qoofalan oo la tacaala mushkiladaha kor ku xusan keenana qaab loo asaaso loona hirgaliyo qorshe hawlgab. Waxaa kale oo uu nidaamkaasu wax ka qabanayaa wixii lagu mutaystay adeeggii/shaqadii horay loo qabtay maadaama ay jiraan qaar da'dii hawlgabka gaaray welina sii shaqaynaya.

3. Hadafyada Gaarka ah ee Siyaasaddan waa in:

3.1 Shaqaalaha rayidka dawladda ee gaaray da'da hawlagabka loo xaqiijiyo loona helo daryeel hawlgab iyo liiltir sugan.

3.2 Daryeel la siiyo qoysaska ay ka geeriyoodaan shaqaalaha rayidka hawlgabka.

3.3 Shaqaalaha hawlgabka ah loo sameeyo qorshe lagaga sagootinayo shaqada rayidka lana yareeyo khatarta ah in iyagoo nool ay ka dhammaato wixii ay ku noolaan lahaayeen.

3.4 La abuuro tab dhaqaale ahaan loo joogtayn karo oo shaqaalaha hawlgabka ah iyo kuwa ku tiirsan lagu siin karo daqli hawlgab oo daah furan si joogto ahna looga warbixin karo kuwa ay khusayso oo ay ka mid yihiin dawladda, baarlamaanka, shaqaalaha rayidka, samatabaxayaasha iyo dadwaynaha Soomaaliyeedba.

3.5 La Fudaydiyo sidii lagu bixin lahaa adeegga iyo dareyeelka hawlgabka si hufan oo sax ah.

3.6 Sameynta siyaasadani waxaa hagaya baahida loo qabo in DFS ay bixiso daryeel hawlgab sugan oo ay helaan:

b) Shaqaalaha rayidka dawladda ee hadda shaqeeya iyo kuwa mustaqbalka marka ay gaaraan da'da hawlgabnimada;

t) "**Qaanta adeegii hore"** ee shaqaalaha rayidka dawladda ee gaaray da'da hawlgabka walina hadda ku jira shaqada dawladda.

3.7 j) in dhalinyarada soomlaaliyeed ee da'da yar waxna bartay looga abuuro fursado shaqo adeega guud ee hay'adaha dawladda

4. Seeraha Siyaasadan.

Siyaasaddan waxaa lagu dabbakhayaa oo ay daboolaysaa dhammaan shaqaalaha rayidka dawladda DFS ee rasmiga ah, marka laga reebo kuwa leh sharci kale ee hawlgab ah ee u gaar ah sida ciidamada qalabka sida iyo kuwa ciidan ahaan u habeysan.

5. Soo jeedinta Siyaasaddan

Iyadoo laga duulayo baahida loo qabo in sida ugu dhaqsiyaha badan loo helo siyaasad iyo sharci lagu maareeyo daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda, ayaa waxay siyaasaddan soo jeedinaysaa arimaha soo socda:

5.1 In wax ka bedel lagu sameeyo lana casriyeeyo sharcigii hore L. 5 ee 1969 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda.

5.2 In da'da hawlgabka shaqaalaha rayidka dawladda noqoto 65 sano rag iyo haweenba.

5.3 In sidoo kale la sameeyo xeer hoosaadyo faahfaahsan si loo dhaqan galiyo sharica hawlgabka iyo liiltirka marka dibu habeyn lagu sameeeyo lana ansixiyo.

5.4 In laga aasaaso Wasaaradda Maaliyadda **"Waax"** maamusha sanduuqa hawlgabka ee shaqaalaha rayidka dawladda.

5.5 In la aasaaso **Guddi Kor joogteeya** maamulka iyo guud ahaan arrimaha sanduuqa hawlagabka.

5.6 Marka loo baahdo in maalgelin lagu sameeyo hantida kaydka sanduuqa hawlagabka, siyaasadan waxay usoo jeedinaysaa dawladda in hay'adaha ay khuseyso ee maamula sanduuqa hawlgabka inay soo diyaariyaan siyaasad iyo xeer faahfaahsan ayna meelmariyaan golaha xukuumadda iyo goloyaasha baarlamaanka oo u ogolaanayo in kaydka sanduuqa hawlgabka uu maalgashi sameeyo.

5.7 In la aqoonsado **"Qaanta adeegii hore"** ee ay dawladdu ku leeyihiin shaqaalihii hore ee qaaraanka looga jari jiray sharcigii hawlgabka ee L.5 1969 wixii ka horeeyey 1991 haddii ay la yimaadaan caddeymo ku filan muddo sadex (3) sano gudaheed oo ka bilaabanaysa marka uu dhaqan gal noqda wax kabedelka sharci L.5 1969 ee ay siyaasadani soo jeedineyso.

6. Hannaanka Diyaarinta Siyaasadda Hawlgabka

6.1 Diyaarinta siyaasaddani waxay ku qotontaa kadib markii la sameeyey daraasad, warbixino iyo talo soojeedino ku saabsan baahida loo qabo helidda qorshe daryeela hawlgabka shaqaalaha rayidka dawladda kaa soo uu sameeyey khabiir madax banaan gacanna ka helayo khubarada Bangiga Aduunka iyo sidoo kale Gudigga Farsamo ay u xilsaartay WSHAB oo ka kala socday hay'adaha dawladda ee ay khusaysay.

6.2 Hannaanku wuxuu bilaabmay wadatashiyo ay ka qayb-qaadanayeen madax sarsare oo dawladda ah oo ay hogaaminayaan wasiiro iyo saraakiil iyo lataliyeyaal sare ka socday hay'adaha dawladda ee ay khuseysay. iyo warbixintii farsamo ee uu sameeyey lataliyaha madaxbannaan iyo talooyinkii laga helay intii lagu guda jiray wadatashiyadii baaxadda lahaa ayaa la isku geeyey laguna qaabeeyey jaangooyada siyaasaddan hawlgabka.

6.3 Hannaanka sameynta siyaasaddan waxaa kale oo lagu ku biiriyay qoraalo kale duwan oo laga qoray ama laga soo xigtay siyaasadaha hawlgabka ee dalalka soo koraya gaar ahaan kuwa muslimka ah. Sidoo kale, waxaa kale oo la tixgaliyay waaya-aragnimada baaxadda leh ee laga helay dalalka Soomaaliya la asaagga ah ee soo maray waayo la mida kuwa DFS.

6.4 Sidoo kale sameyta siyaasadan waxaa talooyin wax ku ool ah iyo gacanba ka geystay Guddiga Farsamada dawladda ee ay WSHAB u xilsaartay iyagoo la kaashanayey dhamaan hay'adaha dawladda ee ay khuseysay.

7. Nooca Hawlgabka, Xadigga Qaaraanka & Faa'iidada Daryeelka

7.1 Siyaasadda hawlgabka shaqaalaha rayidka dawladda waxa ay noqonaysaa "**Qorhse daryeel cayiman oo qeexaya daryeelka uu helayo hawlgabaha**" (Defined Benefit Pension Plan) gaar ahaan nooca loo yaqaano "**Hagbad"** (**Pay As You Go Scheme)**" kaasoo ah **"nooc qorshe ah oo ogolaanayo in qaaraanka la aruuriyo lagu bixiyo daryeelka hawlgabaha/hawlgabayaasha markaas taagan"** waana sida uu qabay sharciga hore L.5 1969 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda.

7.2 Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha rayidka rasmiga ah ama joogtada ah ee dawladda waxa uu ku biirinayaa sanduuqa hawlgabka (Pension Fund) xaddi lacageed oo ah shan boqolkiiba (**5%)** mushaarkiisa asaasiga ah.

7.3 DFS waxay sidaa si la mid ah ugu biirinaysaa sanduuqa halwgabka (Pension Fund) xaddi lacageed oo ah boqolkiiba afar (**4%)** mushaarka asaasiga ee qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha rayidka dawladda ee joogtada ah.

7.4 Daryeelka hawlgabka ee uu leeyahay hawlgabaha waxaa lagu jaangoynayaa ama lagu xisaabinayaa qaacidada ah xadiga **1/800th** ee mushaarka asaasiga ah ee bilkasta oo loo dhameystirayo adeega sida uu qeexayo isbedelka sharciga L.5 1969.

7.5 Daryeelada kale ee la siinayo hawlagaba sida lagu qeexay isbedelka sharci L.5 ee 1969 waxay noqonayaan kuwa soo socda:

b) Daryeelka u harayaasha (survivor benefits);

t) Liiltirka qofka shaqada ku geeriyooda (death benefit);

j) Daryeelk Naafanimo (disability benefit);

8. Maareynta & Maamulka Sanduuqa Hawlgabka

8.1 Sanduuqa daryeelka hawlagabka iyo liiltirka ee la dhisayo waxaa maamulaya Wasaaradda Maaliyadda oo u abuuri doonta "**Waax"** u gaar ah oo u xilsaaran maareynta hawl maalmeedka, socodsiinta, bixinta daryeelka iyo liiltirka hawlgabka lana shaqeyn doonta dhammaan haydaha dawladda ee ay khuseyso.

8.2 Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka ee dawladda (GQSHR) ayaa u xilsaaran keydinta iyo haynta xogta galalka shaqaalaha hawlgabka ee dawladda, waxayna si dhaw ula shaqeyndoonaan **"Waaxda"** u xilsaaran Wasaaradda Maaliyadda sanduuqa hawlgabka.

8.3 Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka wuxuu u xilsaaran yahay diyaarinta iyo hubinta liiska shaqaalaha rayidka ah ee uga baxaya shaqada dawaladda hawlgabnimo ama ruqso darteed si loo xaqiijiyo ka saaridda shaqaalaha ceynkaan ah diiwaanka guud ee shaqaalaha dawladda.

8.4 Isbedelka Sharci L.5 ee 1969 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka wuxuu dhisayaa "**Guddi Kor Joogteyn ah"** oo la socon doona maamulka iyo guud ahaan arimaha sanduuqa hawlgabka.

8.5 Kaalinta **"Guddiga Kor joogteynta"** waxaa lagu faahfaahin doonaa isbdelka sharici L.5 ee 1969 iyo xeer hoosaadyadiisa.

8.6 Guddiga Korjoogteynta maamulka arimaha hawlgabka iyo liiltirka ee lagu asaasayo isbedelka sharci L. 5 wuxuu u warbixinayaa Ra'iisul Wasaaraha DFS

isagoo mas'uul uga ah la socodka arimaha sanduuqa hawlgabka ee shaqaalaha rayidka dawladda.

9. Siyaasadda Marxaladda Kala guurka ee Qaanta Adeegii Hore

9.1 Siyaasadani waxay aqoonsantahay jiritaanka shaqaalaha dawladda Soomaaliya ee qaaraan hawlgab ah ku bixin jiray ka hor 1991 sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka ee sharci L. 5 laga soo bilaabo 1dii Janaayo 1970.

9.2 Siyaasadani waxaa kale oo ay aqoonsantahay adeegii hore ee shaqaalaha rayidka dawladda ay bixiyeen inta aan la sameyn siyaasaddan hawlgabka.

9.3 Siyaasadani waxay soo jeedinaysaa in la aqoonsado lana bixiyo qaanta ka dhalatay ama ka dhalanaysa adeegii hore ee shaqaalaha sida uu faahfaahinayo isbedelka Sharci L. 5 1969 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka.

9.4 Isbedelka sharci L.5 1969 wuxuu bixin doonaa daryeel hawlgab iyo liiltir oo ay helaan dhamaan shaqaalaha rayidka dawladda.

10. Kharashka Hirgelinta Siyaasadda Hawlgabka

10.1 Maalgelinta sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka waa waajib qaaraan oo saaran shaqaalaha iyo dawladda, kuwaa soo sanduuqa hawlgabka ku biirin doona xadi qaaran oo mucayin ah sida lagu xusay qodobada kore ee 6.2 iyo 6.3 sidaa si la mid ahna uu tilmaami doono isbedelka sharci L.5 1969.

10.2 In Wasaaradda Maaliyaddu hirgeliso bilowdana fulinta qaaraanka sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka sida lagu jaangooyey isbedelka sharci L.5 1969 marka la ansixiyo, ayna lana bilowdo qaaraanka sanduuqa 1da Janaayo 2022 uuna noqdo mid laga arki karo miisaaniyadda dawladda 2022.

10.3 Wasaaradda Maaliyadda iyada oo kaashanaysa GQSHR waxay soo diyaarindoontaa liiska shaqaalaha rayidka ah ee hawlgabka ah 31ka December 2021 oo dhameystiran si miisaaniyadda daryeelkooda hawlgabnimo iyo liiltirba loogu talagalo laguna daro miisaaniyad sanadeedka guud ee dawladda ee 2022 islamarkaana la xaqiijinayo hawlgabayaasha si rasmi ah looga saaro diiwaanka guud ee shqaalaha rayidka 31ka December 2021 iyadoo loo xaqiijinayo in

shaqaalaha hawlgabka galay ay helayaan daqli bileed ku aadan daryeelkooda hawlgabnimo laga bilaabo 30ka Janaayo 2022.

10.4 Wasaaradda Maaliyadda iyada oo kaashaneysa GQSHR waxay sidoo kale ay soo diyaarin doontaa liiska shaqaalaha rayidka ee hawlgabka galay ama galaya mudada u dhaxeysa 31ka December 2021 ilaa 31ka December 2026, si dawladdu usii ogaato uguna xisaabtanto miisaaniyadda uu u baahan yahay sanduuqa hawlgabka daryeelka shaqaalaha rayidka dawladda mudadaa la sheegay.

11. Xeyndaabka/Qaabka Hirgelinta (Implementation Framework)

11.1 Xeyndaabka/qaabka Shaqo ee Hay'adaha

11.1.2 Dastuurku wuxuu dhammaan shaqaalaha rayidka dawladda ee hawlgabka noqda u damaanad qaadayaa xuquuq daryeel hawlgab ah.

11.1.3 Dawladda waxaa ka go'an hirgalinta ujeedooyinka siyaasadda iyo istaraatiijiyadaha lagu xaqiijinayo in siyaasaddu suurta galiso daryeelka hawlgabka kuwa ka fariistay shaqada dawladda ayna soo jiidato/ haysatana shaqaalaha leh aqoon iyo xirfad looga baahan yahay adeegga guud ee dawladda.

11.1.4 Wasiirka Shaqada & Arimaha Bulshada, wuxuu golaha wasiirada uso jeedinayaa dhisidda **Guddiga Kor joogteynta Sanduuqa Daryeelka Hawlgabka iyo Liiltirka** oo lagu asaasi doono isbedelka sharci L.5 1969, kuwaa soo lahaan doono awoodda kor joogteynta sanduuqa hawlgabka iyo ka shaqeynsiintiisa sida lagu tilmaamay isbedelka sharci L.5 1969 marka la ansixiyo.

11.1.5 Si ay u dhaqan gasho siyaasadan, isbedelka sharci L.5 ee daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda iyo xeer hoosaadyadiisa waxay tilmaami doonaan tabta iyo habraacyada maamulka iyo maareynta daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda.

11.2 Kormeerka iyo Qiimaynta Fulinta Siyaasadda

11.2.3 Waaxaa la diyaarin doonaa xeyndaab kormeer iyo qiimeyn oo lagu cabiro wixii hawlqabadka iyo horumar laga sameeyo fulinta siyaasaddan.

11.2.4 Qorshaha hirgelinta sida lagu faahfaahiyey shaxda hoose ee 13.1 ayaa noqon doona xeyndaab loo isticmaali doono warbixinta joogtada ah ee hirgelinta siyaasaddan.

11.2.5 Guddiga korjoogteynta sanduuqa hawlagabka wuxuu soo saari doonaa warbixin sanadle ah oo ku aadan kormeerka iyo qiimeynta sanduuqa hawlgabka isagoo la wadaagi doona Xafiiska Madaxweynaha, Ra'iisulwaasaraha iyo aqalada Baarlamaanka ee JFS.

12 Dibu eegista Siyaasaddan

Siyaasaddan waxaa dib u eegis lagu sameynayaa shantii (5tii) sanaba mar, ama marka ay hay'adaha masuuliyadaas leh iyagoo tixgalinaya duruufo dhaqaale-bulsho ay soo jeediyaan in dibu eegis la sameeyo.

13 Dhaqangalka Siyaasaddan

Siyaasadda sanduuqa halwgabka ee daryeelka iyo liiltirka Shaqaalaha R ayidka Dawladda iyo lifaaqeedu waxay dhaqan galayaan marka ay Golaha Wasiirada ansixiyaan, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Lifaaqa Shaxda fulinta hawlaha qorshaha Siyaasadda

Yoolka/Hadafya la	Hawlaha	Tilmaanta Xaqiijinta hawlaha	Cidda ka mas'uulka hawlaha	Waqtiga kama danbeysta ee u go'an

Helidda sharci hawlgab iyo Liiltir ee shaqaalaha rayidka dawladda oo la meel mariyey.	▪ Dib u eegis iyo wax ka bedel ku sameynta sharci L.5 1969 oo ahaa sharcigii hawlgabka shaqaalaha rayidka dawladda.	▪ Sharciga hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka L.5 1969 oo dibu eegis iyo casriyey lagu sameeyey lana horgeeyo golaha wasiirada.	▪ Wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada oo kaashaneysa qeybaha ay khuseysa sida Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka.	Janaayo 20keeda, 2021
Helidda **Waax** u dhisan Wasaaradda Maaliyadda oo maamusha sanduuqa hawlgabka.	▪ In Wasaaradda Maaliyadda laga dhiso Waax u gaar ah maamulka sanduuqa daryeelka hawlgabka.	▪ Waax dhisan oo leh xafiisyo iyo shaqaale oo maamusha sanduuqa daryeelka hawlgabka.	▪ Wasaaradda Maaliyadda.	Janaayo 30keeda, 2021.
Helidda Guddiga kor joogteynta sanduuq hawlgabka.	▪ Dhisidda Gudigga kor joogteynta sanduuqa hawlgabka.	▪ Wareegto Ra'iisul Wasaare oo lagu magacaabay xubnaha Guddiga kor joogteynta sanduuqad hawlgabka.	▪ WSHAB iyo XRW.	Janaayo 30keeda, 2021.

Helidda Koonto Bangiga dhexe ee uu lahaado sanduuqa hawlgabka.	▪ In Banggiga Dhexe laga sameeyo koonto lagu keydiyo lagana maamula sanduuqa hawlgabka.	▪ lumber koonto oo ka furan Bangigga Dhexe oo la xaqiijin karo inuu leeyahay Sanduuqa hawlgabka.	▪ Wasaarad da Maaliyadda oo kasshaneysa Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa hawlgabka.	Maarso 15keeda, 2021.
Helidda saadaasha miisaaniyadda sanduuqa hawlgabayaasha 2022 - 2026	▪ Diyaarinta saadaasha miisaaniyad tilmaameysa dhaqaalaha uu u baahan yahay sanduuqa hawlgabka 1da Janaayo 2022 – 31ka December 2026. ▪ Diyaarinta liiska shaqaalaha rayidka ee hawlgabka ah (pension payroll) ee laga fariisinayo shaqada dawladda laga bilaabo December 31ka 2021 illaa December 31ka 2026.	▪ Warbixinta saadaasha miisaaniyadda sanduuqa daryeelka shaqaalaha hawlgabayaasha 2022 – 2026. ▪ Liiska shaqaalaha rayidka ee hawlgabka ah (pension payroll) ee laga fariisinayo shaqada dawladda laga bilaabo December 31ka 2021 illaa December 31ka 2026. ▪ Miisaaniyadda	▪ Waasaaradda Maaliyadda oo kaashaneysa Guddiga Qaranaka ee shaqaalaha Rayidka dawladda iyo wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada.	Maarso 30keeda, 2021.
	▪ Ku darista miisaaniyad sanadeedka guud ee dawladda 2022 misaaniyadda daryeelka hawlgabayaasha shaqada laga fariisinayo 31ka December 2021.	Guud ee dawladda 2022 inay ka muuqato miisaaniyadda loogu tala galay daryeelka hawlgabayaasha shaqada laga fariisinayo 31ka December 2021.		

Helidda xeerhoosaadka sharciga daryeelka hawlagabka	▪ Diyaarinta xeer hoosaadyada lagu fulin doona sharci L.5 marka wax ka bedelka lagu sameeyo lana ansixiyo.	▪ Xeer hoosaadyo iyo habraacyo dhameystiran oo faahfaahsan.	▪ WSHAB oo kaashaneysa mashruuca tayeynta hay'adaha iyo shaqaalaha dawladda.	May 30keeda, 2021
Helidda nidaam elektaroonic oo xog-keydin ah (database system)	▪ Sameynta nidaam electronic (database system) lagu maamulo sanduuqa hawlgabka iyo liiska hawlgabayaasha (pension payroll).	▪ Nidaam electronic oo xog keydin ah (database system) oo shaqeynaya.	▪ WSHAB iyo Guddiga Kor joogteynta maamulka sanduuqa hawlgabka oo kaashanaya mashruuca tayeynta hay'adaha iyo shaqaalha dawladda (Somalia capacity injection Project).	Juulyo 30keeda, 2021.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 129 **Tariikh: 19/06/2023**

XEERKA: XEER NIDAAMIYAHA TARIIFADA KORANTADA.

XRW - BIXIT
20 JUN 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (i) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqada summadeedu tahay **WTKHB/XW/040/23** ee ku taariikheysan Juun 18, 2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23 ee 19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leeyihiin meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23** ee **19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana **Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada.**

Qodobka 3aad

Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
IXAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-060-23
TAARIIKH: 09-07-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA TAMARTA IYO KHAYRAADKA BIYAHA

XEER-NIDAAMIYAHA TARIIFADA KORONTADA

Xeer Lr.: ……../

Juun, 2023

TUSMO

1. Magaca iyo Dhaqan-galka..... 3
2. Baaxadda..... 3
3 Ereybixin.....4
4 Mabaadi' Guud..... 5
5 Tariifo ku Jaan-go'an Adeeg-bixiye Gooni ah..... 6
6 Tariifo Guud.....7
7 Mabd'a Guud ee Tariifada.....7
8 Deeqda, Kabka iyo Dhiirigalinnada..... 8 9 Tixgalinta Kharashka Raasumaalka.....8
10. Dib-u-eegista ku Salaysan Qiimaha Shidaalka.....8
11. Khidmadaha Rukhsadaha iyo Codsiga Ansixinta Tariifada.....8
12. Qaabka Tariifada iyo Habka Dejinteeda..... 9
14. Habraaca Codsiga Tariifada.....10
15. Dib-u-eegista ku Salaysan Qiimaha Shidaalka iyo Isu-dheellitirka Xisaabaadka..... 11
16. Latashi dadweyne..... 11

Si waafaqsan Sharciga Korontada, 2023 waxay Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha soo saaraysaa:

XEER-NIDAAMIYAHA TARIIFADA ADEEGGA KORONTADA, 2023

QAYBTA1AAD

QODOBBOGUUD

1. Magaca iyo Dhaqan-galka

a. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Tariifada Adeegga Koronta, 2023.

b. Xeernidaamiyahan wuxuu dhaqan galayaa taariikhda uu meel-mariyo Golaha Wasiirrada, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

2. Baaxadda

a. Xeer-nidaamiyahan wuxuu ku dabbaqmayaa Adeeg-bixiyeyaasha Korontada dalka kuwa hadda jira iyo kuwa cusub intaba, oo ay ku jiraan milkiileyaasha, shaqaalaha, iyo macaamiisha adeegyada korontada, iyo sidoo kale dhinacyada ay khusayso oo ay ku jiraan hay'adaha dawladda, shirkadaha danta guud iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee hoos yimaadda Sharciga Korontada.

b. Dhamaan Adeeg-bixiyeyaasha waa in ay soo gudbiyaan jaangoyntooda qiimaha tariifada si loogu ansixiyo si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyagoo usoo gudbinayo qaabka loo qeexay ugu yaraan laba (2) bil ka hor sannad-xisaabeedka xiga laga billaabo taariikhda faafinta Xeer-nidaamiyahan.

c. Xeer-nidaamiyahan wuxuu ku dabbaqmayaa jaangoynta iyo ansixinta tariifada hawlaha dhalinta, gudbinta iyo qaybinta korontada nooc kasta ha ahaadeen.

3 Ereybixin

a. Inta lagu guda jiro Xeer-nidaamiyahan, haddaan si kale loola jeedin ereyada soo socda waxay yeelanayaan macnaha hoose,

I. **"Sharci"** waxaa loola jeedaa Sharciga Korontada

II. **“Isu Dheellitirka Xisaabaadka”** waxaa loola jeedaa isu dheellitirka xisaabaadka si loo jaangooyo faa’idada iyo khasaaraha adeeg-bixiyaha sannadkii ka horraysa xilliga la jaangoynayo tariifada;

III. **“Codsi”** ama **“Codsiga Ansixinta Tariifada”** waxaa loola jeedaa codsiga ansixinta tariifada ee uu soo gudbisto Adeeg-bixiyaha si uu macaamiisha koronto u siiyo;

IV. **“Hay’adda”** waxaa loola jeedaa Hay’adda Korontada Qaranka;

V. **“Biilka”** waxaa loola jeedaa curaarta lacageed ee macmiilka laga qaadayo ama looga baahan yahay in uu ku bixiyo isticmaalkiisa korontada;

VI. "**Macaamiisha"** waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

VII. “**Qaybinta**" waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

VIII. " **Hay’adda Korontada Qaranka”** ama “**Hay’adda**" waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

IX. **“Adeeg-bixiye”** waxaa loola jeedaa shirkad ama shakhsi qaybiya isla markaana ka iibiya macaamiisha koronto laga dhaliyo hannaan gooni u dhisan ama shabakad guud ku xiriirsan, kaas oo leh ama aan lahayn qalab koronto dhalin;

X. **“Koronto”** ama “**Xoogga Korontada”** waxaa loola jeedaa tamarta laga helo danab koronto oo ku qulqulaya fiilooyin ama qalab kale;

XI. **"Khidmadda"** waxaa loola jeedaa lacagaha ku waajibay adeeg-bixiye koronto ama Rukhsadle, taas oo ay Hay’addu dejiso xilli ka xilli;

XII. **“Rukhsad Guud”** waxaa loola jeedaa ogolaanshaha bixinta adeegyo koronto sida dhalinta, gudbinta iyo qaybinta sida ku qeexan Sharciga;

XIII. **“Tariifo Guud”** waxaa loola jeedaa tariifo ku dabbaqmaysa adeeg-bixiyeyaasha ku qeexan Qodobka 6.b ee Xeer-nidaamiyahan;

XIV. **“Rukhsad”** waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Sharciga;

XV. **“Rukhsadle”** waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Sharciga;

XVI. **“MW”** waxaa loola jeedaa halbeegga cabirka korontada ee Meegawaatka;

XVII. **“Tamarta is-cusboonaysiisa”** waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Sharciga;

XVIII. **“Tariifada Iibka Tafaariiqda”** waxaa loola jeedaa qiimeyaasha go’an ee uu ku koco iibka koronta iyo qaybinteeda;

XIX. **“Gudbinta”** waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Sharciga.

b. Haddii aan si kale loogu sheegin, Xeer-nidaamiyahan:

I. Erayada sheegaya lab ama dheddig waxa ku jira jinsiga kale, kuwa kelida sheegayana waxa soo galaya wadarta, caksiguna waa sax.

II. Erayada ama tibaaxaha lagu isticmaalo Xeer-nidaamiyahan laakiin aan la qeexin waxa ay lahaanayaan macnaha ay ku leeyihiin Sharciga Korontada, 2023;

III. Tixraac walba oo lagu sameeyo qodob sharci waxaa soo galaya wax kabadillada lagu sameeyay ama qodobbada sharci ee kale ee hadba lagu baddelo iyo Xeer-nidaaminnada iyo wareegtooyinka kale ee ka dhasha waqti ka waqti;

IV. Haddii taariikh Xeer-nidaamiyahani waajibiyay in hawl qabsoonto aanay ahayn maalin shaqo, hawshaas waa in ay qabsoonto maalinta shaqo ee xigta.

4 Mabaadi’ Guud

a. Adeeg-bixiyaha korontada waa in uu Hay’adda codsi ugu soo gudbiyaa jaangoynta tariifada si loogu ansixiyo si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan ugu yaraan laba (2) bilood ka hor billowga sannad-xisaabeedka xiga.

b. Adeeg-bixiyaha korontada wuxuu codsiga tariifada soo gudbin karaa kaliya marka uu helo Rukhsadda laga ma maarmaanka u ah si waafaqsan Sharciga iyo Xeer-nidaamiyaha Rukhsadda Korontada.

c. Adeeg-bixiyuhu wuxuu macmiilka ku siin karaa korontada qiime ay isla qaateen si ku meel gaar ah, ilaa iyo inta ay jaangoynta tariifada ka ansixinayso Hay’adda.

d. Haddii ay Hay’addu meelmariso tariifada, jaangoynteeda ayaa barabixinaysa heshiiskii ay isla qaateen macmiilka iyo Adeeg-bixiyaha.

e. Tariifada ay meelmarisay Hay’adda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waxay dhaqangal ahaanaysaa sannad. Si kastaba ha ahaatee, Adeeg-bixiyaha korontadu waxa uu xaq u

leeyahay dib u eegis ku salaysan qiimaha shidaalka iyo isbed-bedelka sicirka suuqa lixdii (6) biloodba mar.

f. Si waafaqsan Sharciga iyo Xeer-nidaamiyaha:

I. Qiimaha tariifada waa in uu ka turjumaa kharashka adeeg-bixinta galay isla markaana u ogolaadaa Adeeg-bixiyaha helitaanka faa'ido macquul ah'

II. Qiimaha tariifada waa in lagu xisaabiyaa deeqaha iyo kabka ay helaan

shirkadaha;

III. Tariifada waa in ay u dhignaataa qaab dhiirri-galinaya tayaynta adeegga iyo maalgashiga dheeriga ah ee uu galinayo Adeeg-bixiyuhu;

IV. Tariifada waa in ay u qaabaysan tahay hab tix-galinaya noocyada kala duwan ee macaamiisha.

QAYBTA2AAD

QAABKA TARIIFADA IYO FALSAFADDA LAGU DHISAYO

5 Tariifo ku Jaan-go'an Adeeg-bixiye Gooni ah

a. Iyada oo la raacayo Sharciga Korontada, Hay'addu waxay awood u leedahay inay go'aamiso una meel-mariso jaan-goynta tariifada Adeeg-bixiyeyaasha Korontada.

b. Adeeg-bixiyeyaasha Korontada, si loo gaaro xasillooni ganacsi waa in ay u xareeyaan codsiga tariifada qaabka lagu qeexay foomka Hay'adda.

c. Hay'addu waxay go'aamin doontaa jaan-goynta tariifada si waafaqsan mabaadi'da tariifada ee lagu asaasay Xeerarkan.

6 Tariifo Guud

a. Hay'addu, xilli ka xilli, waa in ay daabacdaa tariifo guud oo ku salaysan qiimaha iyo isbeddellada suuqa si loogu fududeeyo Bixiyeyaasha Adeegga Korontada.

b. Bixiyaha Adeegga Korontada ee u adeegaya macaamiil wadartoodu aysan ka badnayn <500> ama wadarta korontada ay macaamiishooda kula heshiiyeen ayna ka badnayn <150 KW – waxaa lagu dabaqayaa tariiftadan hadba sida ay ugu haboontahay sanad xisaabeedka la joogo.

7 Mabd'a Guud ee Tariifada

a. Tariifada hoos timaadda Xeer-nidaamiyahan markii la jaan-goynayo waa in ay ku salaysnaato kharash-ka adeegga oo ay faa'ido dheertahay waxaana kharashaatkaas la tixgalinayo qayb ka noqonaya:

I. Xaddiga qiimo dhaca; (ku salaysan hantida/agabka la aqoonsan yahay)

II. Kharashaadka dayactirka iyo shaqada;

III. Faa'idada raasumaalka;

IV. Canshuurta ku waajibaysa, iyo khidmadaha kale/ (sida khidmadaha Rukhsadaha);

V. Deymaha

VI. Qiimaha shidaalka iyo dib u eegista ku salaysan Qiimaha Shidaalka (sida ay ugu haboon tahay)

VII. Sarifka lacagaha qalaad iyo isbeddellada sicirka suuqa;

8 Deeqda, Kabka iyo Dhiirigalinnada

a. Markii ay go'aaminayso tariifada si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan Hay'addu waa in ay tixgelisaa wixii dhiirigelin, deeq ama kaalmo ah oo ay shirkaduhu ka helaan Dawladda, Deeq-bixiyayaasha, ama hay'adaha kale ee caalamiga ah, oo ay ku jiraan faa'iidada qiimo-dhaca degdegga ah, ee uu ka faa'iidaysanayo hawlaha bixinta adeegyada korontada,.

b. Deeq, kabitaan ama dhiirigelin kasta oo uu helo Adeeg-bixiyaha Korontada, kaas oo aan la tixgalin wakhtiga go'aaminta tariifada, waxa laga jaraya biilka Adeeg-bixiyaha Korontada ee soo socda ka dib marka la helo deeqdaas, kabka, ama dhiirigelinta hadba sida ugu haboon oo ay u qeexdo Hay'addu.

9 Tixgalinta Kharashka Raasumaalka

a. Si loo maareeyo sicir-bararka suuqa, loona abuuro jawi ganacsi oo cadaalad ah, Hay'addu waxay tixgelin doontaa qiimaha raasumaalka maan-galka ah iyo arrimaha saamaynta ku leh sida sicir-bararka iyo kala duwanaanshaha sarifka lacagaha qalaad, si loo go'aamiyo loona ansixinayo tariifada.

10. Dib-u-eegista ku Salaysan Qiimaha Shidaalka

a. Adeeg-bixiyaha Korontada waxaa loo tixgalinayaa isbedbedalka qiimaha shidaalka lixdii (6) biloodba mar.

11. Khidmadaha Rukhsadaha iyo Codsiga Ansixinta Tariifada

a. Kharash kasta oo uga baxa Adeeg-bixiyaha helista Rukhsadda iyo meel-marinta tariifada waxaa lagu xisaabinayaa in uu qayb ka yahay kharashka galay bixinta Adeegga Korontada.

12. Qaabka Tariifada iyo Habka Dejinteeda

a. Hay'addu waa in ay u hoggaansantaa habka tariifada si waafaqsan

Xeer-nidaamiyahan.

b. Adeeg-bixiyaha Korontadu waa in uu soo gudbiyaa dakhli sannadeedka celcelis ahaan loo baahan yahay soona bandhigaa qaab-dhismeedka tariifada iibka korontada ee dhammaan qaybaha macaamiisha xilliga loo asteeyay buuxinta codsiga si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo sharciyada kale ee lagu dabaqi

karo.

c. Iyada oo lagu saleynayo codsiga uu soo gudbisanayo Adeeg-bixiyaha Korontada ee jaan-goynta tariifada, wixii kabis, dhiirigelin, ama qiima-dhimis ah, waa in tixgalin dhamaystiran la siiyaa lana ogaysiiyaa Hay'adda iyadoo la raacayo Xeer-nidamaayahan.

Waxaa laga ma maarmaan ah in tariifada iibka korontada ee Hay'adda loo soo gudbiyay ay noqtaa mid ka tarjumaysa kharashka galay bixinta adeegga, waxayna u oggolaan doontaa qaybaha kala duwan ee macaamiisha inay is kabaan si waafaqsan Sharciga.

13. Iyadoo aan wax loo dhimaynin qodobbada Xeer-nidaamiyahan, ka turjumidda kharashka baxay ma tilmaamayso in dhammaan kharashyada qorshaysan si toos ah loo tixgalinayo. Sidoo kale, baahida macaamiisha ee la odorrosayo si toos ah looma tixgalianayo.Hay'addu waxa ay hubinaysaa kharaashaadka qorshaysan ee loo soo gudbiyay ee ku aaddan hawlaha Rukhsadda in ay yihiin kuwo si sax ah uga turjumaya kharash macquul ah oo suurtagalinaya in baahida suuqa taalla ee sida ugu haboon loo odorrasay loo daboolo sida ugu haboon, iyadoo baahida macaamiisha lagu salaynayo xogaha la xaqiijin karo. Waxaa intaa dheer oo laga rabaa Adeeg-bixiyaha in uu heerka adeeg ee ugu sarreeya uu ku dadaalo in uu gaaro isagoo u maraya qorshe uu ku yaraynayo khasaaraha iyo qorshayaasha kale ee tayada shaqadiisa sare loogu qaadayo, hadba sida ay ugu qeexan yihiin Heshiiska Rukhsadda.

QAYBTA3AAD

CODSIGA TARIIFADA IYO HABRAACA NIDAAMINEED

14. Habraaca Codsiga Tariifada

a. Adeeg-bixiyaha Korontada waa in uu xareeyaa arjiga tariifada, iyo codsiga isu dheelli tirka xisaabaadka, mar kasta oo ay ku habboon tahay, isaga oo u maraya qaabka loo qeexay iyada oo ay la socoto khidmadda codsiga ee ku habboon.

b. Adeeg-bixiyaha Korontadu waa in uu ugu soo gudbiyaa Hay'adda xogaha soo socda habka loo qoondeeyay oo ay la socoto qaabka tariifada si loo go'aamiyo
jaan-goynta tariifada.

I. **Qiimaha Raasumaalka:** Adeeg-bixiyaha Korontada waa in uu soo gudbiyaa faahfaahinta kharashka raasumaalka ee ku baxay dhalinta, iyo qaybinta korantada. Kharashkaani waa inuu noqdaa mid lagu daro kharashka dhulka, kharashyada horumarinta, dhammaan raasumaalka shaqaynaya iyo kan aan shaqaynayn oo ay ku jiraan matoorrada iyo mashiinnada, shaqaalaha, dhismaha, kharashka maalgelinta, iyo kaabayaasha kale ilaa barta isku xirka shabakadda;

II. **Kharashaadka shaqada iyo dayactirka:** Kharashkan waa in ay ku jiraan qiyaasta dhammaan kharashyada uu galay Adeeg-bixiyaha Korontadu si uu u siiyo macaamiisha koronto. Kharashkan waa inuu ka kooban yahay mushaharka, gunnooyinka, kharashaadka maamulka, dayactirka qalabka iyo kharashka shidaalka haddii ay dhacdo in uu soo saaro koronto ku kacaysa

shidaal;

III. **Deynta iyo amaahda:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu sidoo kale soo gudbiyaa faahfaahinta kharash kasta oo deyn/amaah ah oo ay ku jiraan ilaha lacagaha;

IV. **Xogta macmiilka:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu soo gudbiyaa xogta hore loo hayay iyo tan odorroska ah ee macaamiisha labadaba, hadba sida ugu habboon, sida, tirada macaamiisha, xaddiga korontada xiran, wadarta baahida macaamiisha jirta iyo baahida macaamiisha ee la saadaaliyey;

V. **Xogta Xisaabaadka maaliyadeed:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu soo gudbiyaa xisaabaadka maaliyadeed ee la hubiyay labadii sano ee u dambeeyay;

VI. **Deeqaha iyo Kabka:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu soo gudbiyaa warbixin qeexaysa dhamaan xog kasta oo deeq, kab ama dhiirigelin ee laga helay, laga sugayo ama la filayo in laga helo, dawladda, Deeq-bixiyayaasha, hay'adaha caalamiga ah, ama hay'adaha kale ee guud iyo sida tan loo

tixgaliyay;

VII. **Qorshaha maalgelinta:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu soo gudbiyaa liiska maalgelinnada la filayo iyo/ama qorshayaasha casriyaynta

hannaankiisa shaqo, haddii ay jiraan;

VIII. **Nooca tariifada**; iyo

IX. **Macluumaad kasta oo kale oo ay u dirto Hay'addu**

15. Dib-u-eegista ku Salaysan Qiimaha Shidaalka iyo Isu-dheellitirka Xisaabaadka

a. Adeeg-bixiyaha Korontada waxa uu xarayn karaa codsiga tixgalinta dib-u-eegista tariifada iyadoo loo eegayo isbeddelka qiimaha shidaalka sida ku cad qaabka loo qoondeeyey arjiga

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 130 **Tariikh: 19/06/2023**

XEERKA: XEER NIDAAMIYAHA RUKHSADDA KORANTADA

XRW - BIXIT
20 JUN 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (i) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqada summadeedu tahay **WTKHB/XW/040/23** ee ku taariikheysan Juun 18, 2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23 ee 19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leeyihiin meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23** ee **19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana **Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada.**

Qodobka 3aad

Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Mudane, Hamza Abdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/061/23
TAARIIKH: 09/07/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

CUTUBKA 1aad

QODOBBO GUUD

1. Magaca Xeer-nidaamiyaha:

a. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Rukhsadda Korontada, 2023.

b. Xeer-nidaamiyahan waxa uu dhaqan gelayaa taariikhda uu meel mariyo Golaha Wasiirrada, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

2. Baaxadda Xeer-nidaamiyaha:

A. Xeer-nidaamiyahani waxa uu khuseeyaa dhammaan Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee cusub iyo kuwa hadda jira, iyo sidoo kale shirkad kasta oo gaar loo leeyahay iyo mid guud oo ku lug leh:

I. Dhalinta, ka ganacsiga, soo dejinta ama dhoofinta, gudbinta ama qaybinta tamarta korontada, ama

II. Qaybinta tamarta korontada ee macaamiisha

III. Hawlaha maaraynta hannaaka gudbinta korontada

B. Dhammaan Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee shaqeeya, haddii aan looga dhaafin Qodobka 2.C ee hoose, waa in ay soo gudbiyaan codsigooda Rukhsadda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyaga oo raacaya qaabka loo qoondeeyay laba (2) bilood ka dib faafinta Xeerarkan.

C. Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee shaqeeya ama kuwa cusub oo wadarta awooddooda dab-dhalin ee rakiban aysan dhaafsiisnayn < 50 kW > ama u adeega tira macaamiil ah oo ka yar <500> waxaa laga dhaafayaa shuruudaha qaadashada Rukhsaddan.

D. Dab dhalinta aan ganacsiga ahayn ee aan ka badnayn < 2 MW> waxaa laga dhaafayaa shuruudaha qaadashada Rukhsaddan.

E. Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee jira ama kuwa cusub ee wadarta awoodda dab dhalintooda ee rakiban aysan dhaafsiisnayn < 5 MW > ama u adeega tira macaamiil ka yar < 10,000> waxa ay u qalmaan in ay codsadaan Rukhsad guud. Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee ka sarreeya heerarkan waa in ay u codsadaan Rukhsado kala duwan hawlahooda Dab dhalinta, Gudbinta iyo Qaybinta.

3 Ereybixin

A. Xeer-nidaamiyana, haddii aan si kale loo dhigin,

I. "Sharciga" waxaa loola jeedaa Sharciga Korontada, 2023;

II. "Codsiga" waxaa loola jeedaa Codsiga Rukhsad, ama wax ka beddelka, cusbooneysiinta, ama kordhinta muddada Rukhsadda si waafaqsan Sharciga; III. "Hay'adda" macnaheedu waa Hay'adda Korontada Qaranka;

IV. "Biil" waxaa loola jeedaa curaarta lacageed ee macaamiisha laga qaadayo ama looga baahan yahay in uu ku bixiyo isticmaalkiisa korontada;

V. "Xeerarka Ganacsiga" waxaa loola jeedaa mabaadi'da iyo curfiga ganacsi ee laga wada aqbalsanyahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

VI. "Macaamiisha" waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

VII. “Maalmo” waxaa loola jeedaa maalmo-shaqo, marka laga reebo maalmaha Jimcaha, iyo maalmaha ciidaha ee u astaysan Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

VIII. "Qaybinta" waxa ay leedahay macno la mid ah sida lagu qeexay sharciga;

IX. "Hay’adda Korontada Qaranka” ama “Hay’adda" waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

X. "Adeeg-bixiyaha Korontada ee Jira/Shaqeeya" waxaa loola jeedaa Adeeg-bixiye koronto oo shaqaynayay ka hor taariikhda uu xeer-nidaamiyahani dhaqangelay;

XI. "Khidmadda" waxaa loola jeedaa lacagta ku waajibta adeeg-bixiye koronto ama Rukhsadle, taas oo ay Hay’addu dejiso;

XII. "Rukhsadda" waxa ay leedahay macne la mid ah kan ku qeexan Sharciga;

XIII. "Rukhsadlaha" wuxu leeyahay macne la mid ah kan ku qeexan Sharciga;

XIV. "Bisha" macnaheedu waa bisha miilaadiga;

XV. "MW" waxaa loola jeedaa halbeegga cabirka korontada ee Meegawaatka;

XVI. “Sarkaal” waxaa loola jeedaa shaqaale ama wakiil idman oo Hay‘adda ka socda;

XVII. "Qofka/Shakhsi" waa shakhsi, shirkad, shuraako, ama urur kasta oo shakhsiyaad isu tagay ah haddii la shuraakeeyo ama aan la shurkaayninba;

XVIII. "Xeer-nidaamiyahan" waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha Rukhsadda (dokumentigan);

XIX. "Tamarta is Cusboonaysiisa " waxay leedahay macne la mid ah sida lagu qeexay Sharciga;

XX. "Jadwalka" waxaa loola jeedaa lifaaqyada xeerkan ;

XXI. " Gudbinta" waxay leedahay macno la mid ah sida lagu qeexay Sharciga.

B Haddii aan si kale loogu sheegin, Xeer-nidaamiyahan:

I. Erayada sheegaya lab ama dheddig waxaa ku jira jinsiga kale, kuwa kelida sheegayana waxa soo galaya wadarta, caksiguna waa sax.

II. Erayada ama tibaaxaha lagu isticmaalo Xeer-nidaamiyahan laakiin aan la qeexin waxa ay lahaanayaan macnaha ay ku leeyihiin Sharciga Korontada, 2023;

III. Tixraac walba oo lagu sameeyo qodob sharci waxaa soo galaya wax kabadellida lagu sameeyo ama qodobbada sharci ee kale ee hadba lagu baddelo iyo Xeernidaaminnada iyo wareegtooyinka kale ee ka dhasha waqti ka waqti;

IV. Haddii taariikh Xeer-nidaamiyahani waajibiyay in hawl qabsoonto aanay ahayn maalin shaqo, hawshaas waa in ay qabsoonto maalinta shaqo ee xigta.

QAYBTA 2AAD

CODSIGA RUKHSADDA

4 Habka Codsiga

a. Iyada oo la raacayo Qodobka 14aad ee Sharciga Korontada Qaranka, Hay'addu waxa ay awood u leedahay in ay oggolaato oo ay bixiso Rukhsadaha korontada.

b. Codsiga Rukhsadda waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ku socda Hay'adda oo lagu keenayo gacanta ama lagu diraa boostada caadiga ah ama loo soo dhiibo gaarsiiye keena xarunta Hay'adda. Waxaa kale oo lagu soo gudbin karaa codsiga Rukhsadda hab elektarooni ah iyada oo lagu soo dirayo ciwaanka Hay'addu u astaysay ee rasmiga ah.

c. Codsiga waa inuu saxeexaa oo taariikhda ku qoraa wakiilka idman ee Codsadaha.

d. Codsiga waa in lagu soo gudbiyaa saddex (3) nuqul oo waraaqo ama qaab elektarooni ah ee habka "Microsoft Office" kuwaas oo ku jira "USB drive".

5 Shuruudaha Mudashada Rukhsadda

a. Codsaduhu waa in uu muujiyaa in uu awoodo dhaqaale ahaan, farsamo ahaan, iyo maamul ahaanba ku filnaanshaha hawlaha Rukhsadda.

b. Codsaduhu waa in uu muujiyaa awoodda uu u leeyahay in uu ku abaabulo shaqaalaha looga baahan yahay dhinac kasta oo ka mid ah dhinacyada soo socda, oo kala ah:

I. Qorshaynta, injineernimada, dhismaha iyo maaraynta xarumaha dab-dhalinta iyo qaybinta;

II. Hawlaha iyo dayactirka xarumaha dab-dhalinta iyo qaybinta;

III. Xiriirka macaamiisha

IV. Maamulka ganacsiga oo ay ku jiraan xisaabinta, biilasha, qaansheegadka, iwm.; V. Maamulka, maaliyadda, maaraynta, sharuucda iyo xeerarka, iyo xisaabaadka. VI. Deegaanka, caafimaadka iyo bedqabka;

c. Waa in loo hoggaansamo shuruudaha farsamo ee shaqaalaha ka hor inta aan la samayn ama aan la guda galin ganacsiga Rukhsadda loo qaatay.

d. Codsaduhu waa in uu siiyaa Hay'adda faahfaahinta xirfadlayaasha iyo shaqaalaha taageera ee uu ku hawlgaliyay shaqo wakhti buuxda ah, ka hor inta uusan bilaabin ganacsiga uu Rukhsadda u dalbanayo.

e. U hoggaansanaanta codsadaha ee kor ku xusan waa in lagu muujiyaa sida ku cad codsigooda Rukhsadda.

6 Foomka Codsiga

Codsigu waa inuu ahaadaa qaabka lagu sheegay Jadwalka 1C ee Xeer-nidaamiyahan waana in uu ka koobnaadaa macluumaadka lagu cayimay. Foomka codsiga waxaa laga heli karaa xafiiska Hay'adda ama waxaa laga soo dejisan karaa barta internet-ka ee Hay'adda.

7 Macluumaadka Iyo Dukumeentiyada La Socda Codsiga

Dhammaan codsiyada Rukhsadda waa in ay la socdaan dhammaan macluumaadka lagu sheegay foomka codsiga ee la xiriira Rukhsadda gaarka ah ee la codsanayo.

8 Kharashka Qabshada Codsiga

Codsaduhu waa in marka uu soo gudbiyo Foomka Codsiga, uu bixiyo khidmad aan la soo celin karin oo ay u cayintay Hay'addu qabashada Codsiga.

9 Qabashada Codsiga

Marka la helo Codsiga, Hay'addu waa in ay ku qortaa taariikhda la helay waxayna u diri doontaa codsadaha qoraal caddaynaya sheegaya taariikhda la qabtay.

10. Xog Dheeraad ah

1. Hay'adda ayaa laga yaabaa, marka ay dib u eegis ku samayso Codsiga, in ay la socodsiiso codsadaha inuu ku keeno, muddo cayiman, macluumaad dheeraad ah oo looga baahan yahay. Si kastaba ha ahaatee wakhtiga u dhexeeya helitaanka Codsiga iyo dukumentiyada la socda iyo taariikhda ay Hay'addu ogeysiiso Codsadaha ee ku filnaansho la'aanta dukumentiyada iyo macluumaadka waa in aanay ka badan 21 maalmood.
2. Codsigu waa dhici doonaa haddii codsaduhu uusan ku soo gudbin dhammaan dukumeentiyada loo baahan yahay lixdan (60) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda ay Hay'addu codsato macluumaadka dheeraadka ah.
3. Codsiga dhacay dib looma hawlgelin karo. Si kastaba ha ahaatee, codsigan oo kale waxa dib loogu soo gudbin karaa codsi cusub ahaan, iyada oo la bixinayo kharashka codsiga.

11. Ogeysiinta Diiwaangelinta Codsiga ee wakhtiga saxda ah

Haddii ay Hay'addu u aragto in codsigu dhammaystiran yahay, waxa ay soo saaraysaa go'aan ah in codsiga si sax ah loo sameeyay. 21 maalmood gudahooda marka go'aanka la meel mariyo, Hay'addu waa in ay qoraal ku ogeysiiso codsadaha in codsiga si sax ah loo sameeyay.

12. Ogeysiinta Dadweynaha ee Codsiga

Soddon (30) maalmood gudahooda ka dib marka la helo ogaysiinta Hay'adda ee ah in Codsi si sax ah loo sameeyay, Codsaduhu waa in uu kharashkiisa ku daabacaa ogaysiis in codsiga la aqbalay ah.

13. Diidmada iyo Dhegaysiga

a. Qof kasta oo raba inuu diido bixinta Rukhsaddaas waa in uu soo gudbiyaa diidmo qoraal ah kow iyo labaatan (21) maalmood gudahood ah, laga bilaabo taariikhda Ogeysiiska Dadweynaha. Diidmada waa in lagu xareeyaa qaab codsi ah oo Hay'adda ku socda oo laba (2) nuqul oo waraaqo ah ama nuqul elektaroonig ah oo ku qoran

qaabka “Microsoft Office” oo ku jira “USB drive” ama “CD-Rom”, ama lagu soo diro ciwaanka Hay’adda ee rasmiga ah.

b. Diidmada waa in ay Hay’addu la wadaagto Codsadaha si uu uga jawaabo.

c. Ka dib daabacaadda Ogeysiiska Dadweynaha iyo dhamaadka wakhtiga loo cayimay gudbinta diidmada, Hay’addu waxa ay Codsiga u astayn kartaa dhageysi oo dhacaya waqti cayiman, kadib marka la qiimeeyo lana tixgeliyo diidmo kasta oo la soo gudbiyay.

d. Hay’addu waxa ay ogeysiin doontaa dhageysiga iyo waqtiga uu qabsoomayo Codsadaha, dadka soo gudbiyay diidmada, iyo sidaas oo dhinac kasta oo ay Hay'addu u aragto in ay khusayso. Hannaanka dhegaysigu waa in uu ahaadaa qaabka iyo sida ay u qeexday Hay’addu waxaana lagu soo gabagabeynayaa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah.

e. Hay’adda ayaa laga yaabaa in ay diiddo dhegaysiga noocaas ah haddii ay u aragto in diidmadu tahay mid aan macquul ahayn ama dhab ahayn.

f. Natiijooyinka Hay'addu gaadho ka dib weydiinta/dhegeysiga waa in lagu diwaangeliyaa qoraal.

14. Oggolaanshaha ama diidmada Rukhsadda

a. Ka dib markii la tixgeliyo codsiga iyo weydiinta haddii ay jirto, Hay'addu waxa ay bixinaysaa ama diidaysaa bixinta Rukhsadda.

b. Muddada u dhaxaysa ogaysiinta qabashada codsiga sida ku cad faqradda 9aad iyo taariikhda ay Hay’addu ogeysiiso codsadaha go’aankeeda ama go’aanka ay soo jeedinayso ee ah oggolaanshaha ama diidmada Rukhsadda sida ay xaaladdu tahayba, waa in aanay ka badnaan 90 Maalmood.

c. Marka ay Hay'addu ogolaato Rukhsadda, waa in ay ku war gelisaa codsadaha qoraal ahaan oggolaanshahaas iyo shuruudaha uu ku soo baxay, kaas oo ay ku jiraan kharashyada la bixinayo ka hor qaadashada Rukhsadda.

d. Haddii ay Hay’addu doonayso in ay diido bixinta Rukhsadda, waa in ay qoraal ku wargelisaa codsadaha iyada oo sheegaysa sababaha go'aanka.

e. Codsaduhu waa inuu helaa fursad uu xogo ku filan ugu soo bandhigo Hay’adda kow iyo labaatan (21) maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta codsaduhu helo ogeysiiska Hay’adda ee diidmada Rukhsadda.

f. Hay'addu waa inay tixgelisaa xogaha uu soo badhgigay codsaduhu oo, haddii bandhigaas lagu guuldareysto, ama aan la helin wax xog bixin ahba, waa in ay si sax ah oo qoraal ah u ogeysiiso codsadaha in Codsiga Rukhsadda la diiday.

g. Sababaha loo diiday Rukhsadda waa in ay si cad qoraal ahaan ugu sheegtaa Codsadaha.

QAYBTA 3AAD

WAX KA BEDELKA RUKHSADDA

15. Wax ka bedelka Rukhsadda la bixiyay:

a. Shuruudaha Rukhsadda ay bixiso Hay’addu waxaa la bedeli karaa;

I. Haddii Rukhsadluhu ku soo codsado foomka lagu qeexay Jadwalka 3aad ee Xeernidaamiyahan;

II. Haddii ay Hay’addu hesho cabasho ka timid macmiil, ururka macaamiil ama Rukhsadle kale;

III. Ama tallaabo ay Hay’addu iskeed u qaaddo.

b Codsiga wax ka beddelka waxaa la samayn karaa wakhti kasta ka dib bixinta Rukhsadda, laakiin haddii ay dhicitaanka Rukhsadda ugu yaraan lix (6) bilood ka harsantahay lama aqbali doono.

c Dhammaan wax-ka-beddellada uusan bilaabin Rukhsadluhu, Hay’addu waxay wax ka beddeli kartaa Shuruudaha Rukhsadda xaaladaha soo socda:

I. xaalad kasta oo jirta oo ka dhigaysa lagama maarmaan in Rukhsadda wax laga bedelo danta guud awgeed,

II. Rukhsadluhu haddii uuna awoodin in uu buuxiyo shuruudaha ay dejisay Hay’addu qaarkood,

III. Rukhsadlaha haddii uusan u hogaansamin qodobbada Xeer-nidaamiyaha qaarkood, Xeerarka Hay’adda, Xeerarka ama curfiga Suuqa, iyo Xeerarka Isku xirka, iyo IV. Haddii uu jiro isbeddel wax ku ool ah oo ku saabsan xaaladda Rukhsadaha.

d Ilaa si kale ay ugu qeexdo qoraal ahaan Hay’addu, codsaduhu waa inuu qabashada codsiga ku bixiyaa khidmad aan la soo celin karin, sida ay kolba Hay’addu u cayinto. **e** Marka Rukhsadluhu soo codsado wax ka beddelka Rukhsadda, Rukhsadluhu waa in uu u daabacaa ogaysiiska wax ka beddelka la soo jeediyay ee Rukhsadda qaabka iyo habka ay u qeexday Hay’addu.

f Habka ku xusan Qaybta 2aad ee codsiga Rukhsadda, waa in la raaco marka laga hadlayo codsiga wax ka beddelka Rukhsadda; si kastaba ha ahaatee, marka wax-ka-beddelka la soo jeediyay uu yahay mid ka dhashay hindisaha Hay’adda, Hay'addu waxay mas'uul ka tahay daabacaadda ogeysiiska dadweynaha ee sheegaya wax ka beddelka la soo jeediyay, haddii loo baahdo.

QAYBTA 4AAD

CUSBOONAYSIINTA RUKHSADDA

16. Cusboonaysiinta Ruksadda

a. Codsiga cusboonaysiinta Rukhsadda ay bixiso Hay'addu waa in la sameeyaa ugu yaraan sagaal (9) bilood ka hor inta ayna dhicin Rukhsadda waana in uu ahaadaa qaabka lagu qeexay Jadwalka 1C ee xeer-niddamiyahan.

b. Haddii aan si kale loogu sheegin qoraal Hay'addu soo saarto, codsaduhu waa in uu bixiyaa khidmad aan la soo celin karin sida ay kolba u go'aamiso Hay’addu markii laga qabanayo Codsiga.

c. Habka ku xusan Qaybta 2aad ee bixinta Rukhsadda waa in la raaco marka laga hadlayo Codsiga cusboonaysiinta Rukhsadda.

QAYBTA 5AAD

Joojinta iyo Baab'inta Rukhsadda

17. Joojinta Rukhsadda

a. Hay'adda ayaa marka ay cabasho ama macluumaad ka hesho adeegsade (Macmiil) , ururka macaamiisha, ama Rukhsadle kale, in ay bilawdo baaritaan ku sahabsan hab dhaqanka ama hawlaha cid kasta oo Rukhsadle ah.

b. Hay'addu way hakin kartaa Rukhsadda ay bixisay haddii ruksadluhu:

I. Aanu awoodin in uu si buuxda u guto hawlaha ama waajibaadka lagu soo rogay Shuruudaha Rukhsadda, Sharciga, Xeerarka dhaqangalka ah; ama

II. Uu u hogaansami waayay Shuruudaha Rukhsaddan, Go'aammada ama tilmaamaha Hay'adda; ama

III. Uu u fulinayo ganacsigiisa Rukhsaddaysan qaab iyo hab khatar degdeg ah ku ah caafimaadka iyo badbaadada bulshada ama caafimaadka ama bedqabka qof kasta; ama

IV. Haddii Rukhsadluhu uu diido in uu u hogaansamo baaritaannada ama waydiimaha Hay'adda ama uu hor istaago sarkaal loo xilsaaray in uu sameeyo baaritaan ama uu ku guuldareysto in uu soo saaro dukumeenti lagu baarayo haddii ay Hay'addu farto; ama

V. Xaalad kasta oo jirta taas oo ka dhigaysa lagama maarmaan in danta guud darteed loo laalo Rukhsadda.

c. Hay'addu waa in ay qoraal ahaan ku wargelisaa cidda haysata Rukhsadda sababaha ay Hay'addu u soo jeedinayso joojinta Rukhsadda isla markaana siisaa Rukhsadlaha fursad uu ku soo bandhigo xog ka dhan ah joojinta la soo jeediyay ama uu ku saxo xaaladda ay ka dhalatay joojinta la soo jeediyay.

d. Marka Rukhsadluhu doorto in uu soo gudbiyo xogo ka dhan ah joojinta ama in u uku dhaqaaqo sixitaanka sababaha keenay joojinta Rukhsadda ee la soo jeediyay, waa in uu ku sameeyaa xog-gudbintiisa iyo/ama sixitaankiisa soddon (30) maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda uu ka helay Hay'adda warqad ogeysiin ah oo ku aaddan sababaha ay Hay'addu u soo jeedinayso joojinta Rukhsadda.

e. Hay'addu waa in ay garwaaqsataa xogaha uu soo gudbiyay Rukhsadluhu si loo gaadho go'aanka kama dambaysta ah. Go'aanka Hay'adda waa in lagu ogeysiiyo Rukhsadlaha qoraal ahaan.

f. Haddii ay Hay'addu go'aansato joojinta Rukhsadda, waa in ay ogaysiisaa qofka Rukhsadda haysta taariikhda ay shaqo ka joojintu dhaqangalayso, waxa ay Hay'addu samayn kartaa amaro ku saabsan qabashada codsiyada Rukhsado oo ay ku jirto amar awood u siinaya shakhsi kale ama Rukhsadle kale in uu la wareego hawlaha si loo sii wado bixinta adeegyada korontada.

g. Amarka joojinta kadib, Hay'addu waxa ay soo rogi kartaa dib u eegis ay ku samaynayso amarkaas isla markaana ay dib u shaqa galin kartaa Rukhsadlaha laga joojiyay Rukhsaddiisa, waxa ay sidoo kale soo saari kartaa go'aan ay ku baabi'inayso Rukhsadda si waafaqsan qodobbada 18 ee Xeer-nidaamiyahan.

h. Hay'addu ma soo rogi karto amar ka joojin ah in ka badan lix (6) bilood waxayna dib u eegis ku samayn kartaa amarkaas ka hor inta ayna dhammaan muddada joojinta ee la soo rogay.

18. Baabi’inta Rukhsadda

a. Hay’addu waxa ay marka ay hesho cabasho ama macluumaad ka socda macmiil, ururka macaamiisha ama Rukshsadle kale, bilaabi kartaa baaritaan ku saabsan dhaqan-gelinta ama shaqaynta Rukhsad kasta.

b. Hay’addu, way baabi'n kartaa Rukhsad haddii:

I. Rukhsadda lagu bixiyay isdaba-marin, been-abuur ama xaqiiqo qarin; ama

II. Rukhsadluhu si bareer ah ama sabab la'aan ah u jebiyo qodobbada Sharciga, Shuruucda iyo Xeerarka Hay'adda; ama

III. Rukhsadluhu ku guul daraysto in uu u hogaansamo shuruudda Rukhsadda kuwaas oo jabintoodu si cad loo tibaaxay in ay keenayso Rukhsad baabi’in;

IV. Rukhsadlaha uu hanti beelo ama ama lagu xukumo inuu musallafay; ama

V. Xaaladda maaliyadeed ee Rukhsadlaha ay keenayso in uusan Rukhsadluhu awoodin in uu si buuxda oo hufan u guto waajibaadka iyo masuuliyadda Rukhsadda.

c. Hay’addu, haddii ay ku qanacdo in ay jiraan sababo ku filan oo lagu burinayo Rukhsad, waa in ay ku ogaysiisaa baabi'inta Rukhsadda Rukhsadlaha iyo dhinacyada kale ay u aragto in ay khusayso.

d. Dacwadaha ay qaadayso Hay’adda ee ku sahabsan baabi’inta Rukhsadaha, ilaa iyo inta la dabiqi karo, waa in ay ahaataa qaabka ay u qeexday Hay’addu:

I. Hay’addu waa in ay qoraal ku ogaysiisaa qofka Rukhsadda haysta in la baabi’inayo Rukhsadda iyo sababta loo baabi’inayo, iyo;

II. Rukhsadluhu waa in uu helaa fursad uu ku muujiyo, lixdan (60) maalmood gudahooda soo gudbinta ogaysiintan ka dib, in xaaladuhu is beddeleen ama in baabi’inta aan looba baahnayn.

e. Haddii ay Hay’addu go'aansato in ay baabi'iso Rukhsadda ka dib markii ay u hoggaansanto nidaamka loo dejiyay, Hay’addu waa in ay u gudbisaa ogaysiis Rukhsadlaha kaas oo qeexaya taariikhda dhaqangalka baabi’inta.

f. Hay’addu waxa ay awood u leedahay halkii ay ka baabi’in lahayd Rukhsadda in ay soo saarto amarro kale oo ku soo rogaya shuruudo dheeraad ah Rukhsadalaha isaga oo loo ogolaan doono in uu ku sii shaqeeyo Rukhsadda haddii uu ka soo baxo.

g. Hay’addu marka ay baabi’iso Rukhsadda, waxa ay soo saari kartaa amaro la xiriira qabashada codsiyo Rukhsadeed, ama tilmaamaha kale ee lagama maarmaanka u ah joogtaynta bixinta adeegga koronto, iyo horumarinta ujeeddoyinka korantada qaranka sida uu Sharcigu dhigayo.

19. La Noqoshada Rukhsadda

a. Hay’addu waxa ay la noqon karyaa Rukhsadda xarumaha aan weli shaqayn haddii Rukhsadluhu:

I. Ku helay Rukhsadda is-dabamarin ama been-abuur ama xaqiiqo qarin; ama

II. Si bareer ah ama si marmarsiiyo la’aan ah u jebiyay qodobbada Sharciga, Shuruucda iyo Xeerarka qabanaya;

III. Ku guul daraystay in uu u hoggaansamo marxaladihii la soo dhaafay ee Rukhsadda;

IV. Ka soo horjeeda shuruud kasta oo u taalla Rukhsadda;

V. Hanti beelo ama lagu xukumo musalaf; ama

VI. ku guul daraystay in uu hawlgeliyo xarumaha Rukhsaddaysan ee ku taxan Jadwalka saddex (3) sano gudahood laga bilaabo taariikhda la siiyay Rukhsadda.

b. Hay'addu waa in ay qoraal ahaan ku wargelisaa cidda haysata Rukhsadda sababaha ay Hay'addu u soo jeedinayso in lagala noqdo Rukhsadda oo ay siiso Rukhsadlaha fursad maangal ah oo uu ku sameeyo xog-bixin lid ku ah soo jeedinta kala noqoshada.

c. Marka uu Rukhsadluhu doorto in uu xog bixiyo, waa in uu xog-bixintiisa ku sameeyaa soddon (30) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda uu helo warqadda Hay'addu ku wargelinayso sababaha ay Hay'addu u soo jeedinayso in lagala noqdo Rukhsadda.

d. Hay'addu waa in ay garwaaqsataa xog-bixinta uu sameeyay Rukhsadluhu si loo gaaro go'aanka kama dambaysta ah. Go'aanka Hay'adda waa in lagu ogeysiiyaa Rukhsadlaha qoraal ahaan.

e. Haddii ay Hay'addu go'aansato in ay kala noqoto Rukhsadda, waa in ay qoraal ku ogaysiisaa cida Rukhsadda haysata go'aankeeda, waxayna soo saaraysaa amaro dhaqan gal ah.

f. Rukhsadda lala noqday dib looma hawlgelin karo, lama beddeli karo, lama cusboonaysiin karo, lamana kordhin karo muddadeeda. Si kastaba ha ahaatee, codsi kale ayuu ku soo gudbin karaa isla Rukhsadluhu, marka uu bixiyo khidmadda loo qoondeeyay.

QAYBTA 6aad

QODOBBO ISKU DHAFAN

20. Dib-u-eegista iyo Racfaanka

a. Qof kasta oo uu dhib ka soo gaaro go'aan ka soo baxay Hay'adda sida waafaqsan Xeernidaamiyaha, waxa uu kow iyo labaatan (30) maalmood gudahooda ka dib marka go'aanka la gaaray, ka codsan karaa Hay'adda in dib-u-eegis lagu sameeyo arrimaha soo socda:

I. Amar ay Hay'addu bixisay;

II. Go'aan ay Hay'addu ku gaartay inaan la bixin Rukhsad;

III. Go'aan ay Hay'adda ku diidday cusboonaysiinta, beddelka ama kordhinta muddada Rukhsadda; ama

IV. Go'aan ay Hay'addu kula noqonayso, laalayso ama ku baabi'inayso Rukhsadda.

b. Hay'addu waa inay si waafaqsan Xeerarkeeda Dacwadda dib u xaqiijiso, dib u eegtaa, beddeshaa ama ka noqotaa go'aankeeda ka hor intaysan soo saarin amarka kama dambaysta ah.

c. Dib-u-eegista ama tix-galinta noocaas ah waa in lagu dhammeeyaa lixdan (60) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda la codsado.

d. Dhammaan amarada, ama go'aammada Hay'addu waxaa ka furan dib u eegis garsoor si waafaqsan Sharciga.

21. Ka noqoshada Codsiyada

a. Codsiga Rukhsadda, wax ka beddelka, cusboonaysiinta, ama kordhinta wakhtiga Rukhsadda waxa uu codsaduhu xilli kasta kagaga noqon karaa qoraal.

Tariikh: 19/06/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 131



XEERKA: XEERKA DHISMAHA XARUNTA TUBSAN

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soojeedinta Wasiiru Dowlaha Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23 ee 19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leeyahay Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23** ee **19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan waxaa hir-gelintiisa u xilsaaran Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN/062/23
TAARIIKH: 04/07/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Qutale

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Tariikh: 19/06/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 131



XEERKA: XEERKA DHISMAHA XARUNTA TUBSAN

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soojeedinta Wasiiru Dowlaha Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23 ee 19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leeyahay Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23** ee **19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan waxaa hir-gelintiisa u xilsaaran Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Xeerka Dhismaha Xarunta Tubsan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
IXAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN/062/23
TAARIIKH: 04/07/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Tariikh: 11/05/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 132

XEERKA: QARAARKA ARRIMAHA LA XIRIIRA SHAQO QORISTA, ISKU BEDDALKA IYO DIB U HABEYNTA SHAQAALAHA RAYIDKA IYO KUWA KU-MEELGAAR AH EE DOWLADDA.

XRW - BIXIT
20 JUN 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobadda 99aad iyo 100aad ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qoddobada **115aad, 116aad, 117aad, 118aad, 119aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee KMG ah;

Markuu arkay: Xeer Ra'iisul Wasaare ***Lr. 127*** ee ku taariikhaysan ***11 Maajo, 2023***, ee ku saabsan Adkaynta Hufnaanta Maamulka iyo Maareynta Maaliyadda Dalka.

Markuu arkay: Siyaasadda Jaangoynta Darajooyinka iyo Mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka Dawladda ee ay ansixiyeen Golaha Wasiirada DFS;

Markuu arkay: Xeer Ra'iisul Wasaare ***Lr. 131*** ee ku taariikhaysan ***6 March, 2021,*** Xeer Ra'iisul Wasaare ***Lr. 086*** ee ku taariikhaysan ***10 Okt, 2019*** iyo sidoo kale ee Xeer Ra'iisul Wasaare ***Lr. 132*** ee ku taariikhaysan ***15 Abril, 2021*** oo dhammaan ku saabsan Xeer-nidaamiyeyaasha Maamulka Shaqaalaha Rayidka Dawladda;

Markuu tixgeliyey: In ay lagama maarmaan tahay in wax laga qabto arrimaha lagu xusay soo jeedinta Qaraarkan ee dib u habeynta Shaqaalaha ku meel gaarka ah iyo kuwa Rayidka ah.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23** ee **19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Qaraarka arrimaha la xiriira shaqo qorista, isku beddalka iyo dib u habeynta shaqaalaha rayidka iyo kuwa ku meel gaar ah** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Joojinta Isku beddalka Shaqaalaha Rayidka Dawladda

In la joojiyo isku beddalka Shaqaalaha Rayidka ha ahaadeen shaqaale geeriyooday, is-casilay ama da' hawl-gab darteed shaqada uga baxaya, si kasta oo jago rayid ah ku bannaanaato laguma meelayn karo shaqaale cusub, marka laga reebo saraakiisha sar sare ee ku yimaada magaacabista si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka kale ee Maamulka Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

Sidoo kale, haddii ay lagama maarmaan noqoto in hay'ad cusub la unko ama kuwo horey u jiray dib u habeyn lagu sameeyo ayna u baahdaaan shaqaale waxaa laga dhex xulanayaa Shaqaalaha Rayidka ah iyada oo loo marayo tartan gudaha ah oo daahfuran.

Qodobka 3aad

Qorista Shaqaalaha Ku meel gaarka ah

Dhammaan Hay'addaha Dawladda waxaa laga joojiyey in ay qortaan shaqaale ku meel gaar ah oo cusub iyada oo la xeerinayo lana garwaaqsan yahay jiritaanka:

1. Shaqaale badan oo ka hawl gala hay'adaha kala duwan ee Dawladda isla mar kaana aan looga faa'iideysan sidii la rabay.
2. Culayska miisaaniyadeed ee dawladda ka saaran kharashka mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka iyo kuwa ku meel gaarka ee ku meelaysan Hay'adaha Dawladda.

Qodobka 4aad

Dib u Habeynta Shaqaalaha Ku meel Gaarka

In dib u habeynta lagu sameeyo dhammaan shaqaalaha ku meel gaarka ah ee hadda ka hawlgala hay'adaha dawladda muddo shan **(5) bilood** gudahood ah. Guddiga lagu xusay Siyaasada Jaangoynta Darajooyinka iyo Musharaadka iyo Guddi hoosaadyo farsamo ayaa la magacaabayaa si ay dib u qiimeyn rasmi ah ugu sameeyaan dhammaan shaqaalaha ku meel gaarka ah tiradooda, aqoontooda, xirfaddooda, khibraddooda, ku habboonaanta shaqada ay hadda hayaan iyo baahida shaqo ee ay dawladdu u qabto hadda iyo mustaqbalka intaba.

Guddigu waxay dajinayaan habraac, hannaan iyo qorshe hawleed qoran oo qeexaya sida loo sameynayo tirakoobka iyo dib u habeynta shaqaaaha ku-meel gaarka ah, habraacyadaas waxa wareegto ku soo saaraya Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, taas oo fududeynaysa dhaqangelinta dib u habeynta shaqaalaha ku-meel gaarka ah.

Qodobka 5aad

Dhaqan Galka Qaraarkan

Qaraarkaan wuxuu dhaqangalayaa marka ay Golaha Wasiiraddu ansixiyaan, isla-markaana uu xeer ku soo saaro Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
IXAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Bure
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-063-23
TAARIIKH: 09/07/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Tariikh: 06/07/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.133



XEERKA: XEER NIDAAMIYAHA HAGAHA IIBKA DEG DEGA AH.

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (i) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqada summadeedu tahay **MOF/OM/319/2023** ee ku taariikheysan Juun 18, 2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.37.07.23 ee 06/07/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Hagaha Iibka Deg Dega ah** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Hagaha Iibka Deg Dega ah.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.37.07.23** ee **06/07/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Hagaha Iibka Deg Dega ah** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana **Xeer Nidaamiyaha Hagaha Iibka Deg Dega ah.**

Qodobka 3aad

Xeer Nidaamiyaha Hagaha IibkaDeg Dega ah waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-064-23
TAARIIKH: 09/07/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

4. Waa in la ogaadaa inuusan jirin hal qaab oo go'an oo lagu wajihi karo Iibka Degdega ah. Tusaale ahaan, marka la qeexaayo nuxurka habraaca Iibka Degdega ah, arrimo badan waxa ay ku tiirsanaan doonan xaalada degdega ah heerka ay mareeyso (xaalada degdeg ah marka ay dhacdo miyaa, marka laga soo kabanaayo miyaa mise dib-udhiska dhibkii kadhashay xaaladaas - Wareegtada, faqradda 11-aad).

5. Wareegtada iyo Hagahaan waxaa lagu dhaqayaa dhamaan Hay'addaha Dowladda Federalka ee wax soo iibsanayaa. Hay'addah DFS ee wax soo iibsanaya waa inay u qaybiyaan Wareegtada iyo Hagahaan shaqaalahooda, walibana ay hubiyaan ina shaqaaluhu fahmo labada dukuminti.

I. Go'aaminta marka Iibka Degdega ah uu banaanyahay

1. Maxaa noqon kara Xaalad Degdeg ah?

6. Iibka Degdeg ah sidiisuba waa qaali, sidaa darteedna waa in maraar dhif ah la isticmaala, oo loogu baahdo in laga jawaabo xaalad degdeg ah. Sida awgeed, isticmaalka Iibka Degdega ah waa inuu ku ekaadaa xaaladaha dhab ahaantii loo baahanyahay. Nuucyada xaaladaha oggolaan kara isticmaalka Habka Iibka Degdega ah (Wareegtada, faqrada 2-aad) waxaa kamid ah:

(b) Musbooyinka daabiiciga ah iyo kuwa bini'aadamku sababo (tusaale, musoobooyinka bay'adda, burburka kaabayaasha ama qalabka muhiimka ah, musoobooyin la xiriira caafimaadka sida cudurada safmarka iyo caabuqa faafa, xaalada degdega ah ee ka dhasha siyaasada sida dagaalka iyo kacdoonada); (t) Xaaladaha degdeg ah ee ka dhasha dagaallada, kacdoonnada iyo falalka argagixiso; iyo
(j) Xaaladaha aan horay loo qiyaasi karin ee keenay in hay'ad DFS ay ku qaban weyso hawl ama adeeg daruuri ah waqtiga ku haboon.

2. Shuruudo nuucee ah ayeey duruuri tahay in la arko, si loo oggolaado Iib Degdeg ah?

7. Sida ku cad kor, waaa inay jiraan shuruudo ay daruuri tahay in la arko kahor inta aan la bilaabin nidaamka iibka degdega ah - xataa haddii ay jirto xaalada degdeg ah oo guud. Shuruudahaas waxaa kamid ah:

(b) jiritaanka xaalad degdeg ah oo dhab ah;
(t) baahi loo qabo kaalmo degdeg ah, taaso oo aan la bixin karin haddii la isticmaalo nidaamka Iibka caadiga ah, ee leh waqtiyada degsan.
(j) xaaladda degdega ah oo aan horay loo arkin ama aheyd mid degdeg ah[1], iyo
(x) xaaladaha aan ka dhalan dayac-darada hay'adda DFS ee wax soo iibsaneysa ama lagu eedeyn karo hay'adda DFS (tusaale ahaan qorsho xumo, ama dhicitaanka misaaniyadda dhamaadka sanad maaliyadeed ma oggolaan karaa isticmaalka Iibka Degdega ah).

8. Iyadoo la isticmaalaayo caqli ku dhisan xirfad, go'aan ka gaarista inay jirto xaalad degdeg ah oo u baahan iib degdeg ah waa in lagu saleeyo xaqiiqooyinka xaalad walba u gaar ah, maadama xaaladuhu waqtiba waqtiga ka danbeeya isbed-bedelaan. Haddii ay macquul tahay in loo sii baahdo in iib dheeri ah lasameeyo, kadib marka laga baxo xaalada degdega ah, waa in go'aanka ah in iibka la xiriira xaalada degdeg ah lagu sii wado sida

[1] Tani meesha kama saareeyo u isticmaalka habka Iibka Degdeg ah xaaladaha degdeg ah ee soo jiitamay (sida abaaraha, nafaqa daradda iyo macluusha)

degdegta ah iyo in kale lagu saleeyaa shuruudaha kore. Tusaale ahaan, markasta oo waqtigu isbedelo, baahida degdegta ah ee loo qabo Iibka Degdegta ah waxa laga yabaa inuu yaraado, oo xaalad markii hore aan la qiyaasi karin ayaa laga yaaba inay noqoto mid la qiyaasi kar.

3. Yaa go'aan ka gaaraya jiritaanka xaaladda degdegta ah?

9. Marka laga soo tago in la qeexo nuucyada xaaladaha jiri kara si loo oggolaado isticmaalka Iibka Degdeg ah, Wareegtada (Faqrada 3-aad) waxay qeexeysaa oggolaanshaha maamul ee loo baahanyahay in la helo si loo xaqiijiyo jiritaanka xaalada degdega ah:

(b) Marka ay timaado xaaladaha degdega ah ee daabiciga ah ama bini'adamku sababo, waa in Xafiiska Raisul-wasaaraha shaaciya jiritaanka xaaladda degdegta ah[2].

(t) Marka ay timaado xaalad amni ee degdeg ah ee ka dhalata dagaal, kacdoon iyo falalka argagixiso, waa in Xafiiska Raisul-wasaaraha shaaciya jiritaanka xaaladda degdegta.

(j) Haddii xaaladu tahay mid aan horay loo qiyaasi karin, oo kadhigeysa midaan macquul aheyn in hay'addaha DFS ee ku shaqada leh inay qabato hawlaha muhiimka ah ama ay bixiso adeegyada daruuriga ah, shaacinta xaalada degdegta ah ee dukumiteeyaysan ee uu bixiyo Sarkaal Idman ee hay'adda ayaa ku filan.

4. Ya goaa'n ka gaaraya isticmaalka Iibka Degdegta ah?

10. Saraakiisha Idman ee hay'adda wax iibsaneysa oo keliya ama sarkaal kale ee Sarkaal Idman u idmaday hawlaha Iibka Degdega ah, ayaa, iyadoo loo hoggaansamaayo shuruudaha lagu qoray Wareegtada, go'aanmin kara, haddi danta guud ay ku jirto, inay jirto xaalad oggolaanaysa isticmaalka nidaamka iibka degdega ah ee ka leexsan nidaamka wax soo iibsiga ee caadiga ah. Balse haddii qiyaasta qiimaha wax lagu soo iibsanaayo ay tahay $100,000 ama ay ka badantahay, waxa loo baahanyahay oggolaanshaha Guddiga Qandaraasyada[3] kahor inta aan la bilaamin isticmaalka nidaamka iibsiga degdega ah.

11. Guddiga Qandaraasyada ayaa usoo saari kara oggolaansho saameeyn tixanleh (blanket approval) qaar kamid ah wax iibsiga isticmaalaya xulashada halka-il oo keliya ah ama iyadoo loo hoggansamaayo Wareegtada, wax iibsiga tooska ah (direct procurement) ee leh tartanka (Wareegtada, faqrada 7-aad).

12. Guddiga Qandaraasyada ayaa oggalaan kara in hal meel laga sameeyo iibsiga (central procurement) mararka ayku haboontahay - sida hadii ay jirto tiro cayiman, si loo yareeyo waqtiga iyo kharashaad maamul ee kale ee ku baxaaya hawlaha iibka (Wareegtada, Faqrada 7-aad); alabahaan waxaa lagu soo iibsan kara qandaraas aan cayimneen (framework agreement), iyadoo lagu daabacaayo website, si'ay ugu fududaato isticmaalayaasha alaabta inay si fudud u dalbadaan.

13. Codsiga oggolaansho raadiska ah ee loo dirsanaayo Guddiga Qanaradaasyada waxaa usoo diraya Guddiga Sarkaalka Idman ama qof uu u idmaday hawshaas.

---

[2] Xarunta heer ah. hay'adda iyo Gurmadka gobol Xarunta kale sidii Qaranka ama Hawlaha ee loo (NEOC) mid Gurmadka DFS isticmali ee qaran, Qaranka inay laha Xafiiska iyadoona waxay hubiyaan Raisul-Wasaaraha isku-duba ka in ayaa kaalmooyinkaas. shaacisa xaaladaha degdegta ah ee degdegta ah ee ka dhalata dagaal, kacdoon iyo falalka argagixiso, waa in Xafiiska Raisul-wasaaraha shaaciya jiritaanka xaaladda degdegta ah[2]. (t) Marka ay timaado xaalad amni ee degdeg ah ee ka dhalata dagaal, kacdoon iyo falalka argagixiso, waa in Xafiiska Raisul-wasaaraha shaaciya jiritaanka xaaladda degdegta. (j) Haddii xaaladu tahay mid aan horay loo qiyaasi karin, oo kadhigeysa midaan macquul aheyn in hay'addaha DFS ee ku shaqada leh inay qabato hawlaha muhiimka ah ama ay bixiso adeegyada daruuriga ah, shaacinta xaalada degdegta ah ee dukumiteeyaysan ee uu bixiyo Sarkaal Idman ee hay'adda ayaa ku filan. rida gacan kaalmada siisa loo Wasaaradaha baahanyahay lagu xalinaayoo ay la xaalada khuseeyso qoondeeyo iyo

[3] Guddiga Qandaraasyada, Xeer-nidaamiyaha, Maaliyadda, Maaliyadda, Gaadiidka ee waxa uu Agaasimaha qof ka-socda iyo Qaranka Hawlaha ee loo waxa uu Agaasimaha qof Guryeynta. aas-aasay ka Waaxda Xafiiska Qodobka koobanyahay Miisaaniyadda, Rai'sul-Wasaaraha 30 (2) Agaasimaha Agaasimha iyo ee waaxda qof Sharciga Guud Iibka ka-socda iyo ee Wasaarada Qodobka Wasaaradda ee Wasaaradda 19 Howlaha ee Guud,

14. Oggolaanshah iibkasta ee degdeg ah waa in la ogeysiiya Maamulka [4] iyo Guddoomiyaha Guddiga Maamulka Khasnadda Mideysan sida ugu dhaqsaha badan, kadib marka lasoo saaro.

5. Codsiga oggolaanshaha iibka degdega ah

15. Hay'adda wax iibsaneysa waa inay usoo dirtaa Foomka Codsiga ee Iibka Degdega ah ee ku jira Lifaaqa B ee Wareegtada. Codsigu waa inuu ka koobnaada faahfaahin cad oo tilmaameysa haddi ay jiro in laga leexanaayo nidaam wax soo iibsiga ee caadiga ah oo ay hay'adda wax soo iibsaneysa ay rabto.

16. Eray bixinta "ka leexasho nidaamka caadiga ah ee wax soo iibsiga" waxay ka koobantahay tallaabooyin dhawr ah, oo ka duwan nidaamka caadiga ah ee wax iibsiga ee Sharciga dhigaayo, sida kuwa khuseeysa heerka tartanka, waqtiga ay tahay inuu qaato hawsha wax soo iibsiga iyo qandraas siinta, isticmaalka nidaamy dukuminti ee ka fudud kuwa sharcigu dhigaayo iyo ka tanaasulida mudada joogsiga (standstill period) ee ka horeeysa qandaraas galista. Majirto hal nidaam oo wax walba ku filan marka laga hadlaayo iibsiga degdega ah, sidaa darteed hay'adda wax soo iibsaneysa waa inay ahaata mid ufuran tillabo kasta oo macquul ah ee lagu oggolaaday Wareegtada iyo Lifaaqeedeeda A, marka ay go'aansaneeyso nidaamka degdega ah oo ay wax kusoo iibsaneyso.

17. Arrinta go'aamisa in laga leexday nidaamka caadiga ah ee wax soo iibsiga ee sharcigu tilmaamay iyo inta ay la egtahay leexashadu ayaa ah "heerka ay mareeyso xaalada degdegta ah" ee wax loo soo iibinaayo (xaalada degdegta ah kadib, xilliga kaso kabashada ama dib-udhiska). (Eeg shaxda 1 ee hoose).

18. Isticmaalka gelista qandaraaska tooska iyadoo lagu saleeynaayo xaalad degdeg ah, taas oo waafaqsan Qodobka 89 (1) ee Sharciga, waxaa hagaya go'aamada iyo ansixinta maamul ee lagu sheegay Lifaaqa A ee Wareegtada.

19. Ka leexashada nidaamka iibsiga caadiga ah oo keliya ee lagu baneeyay oggolaanshada nidaamka iibka degdega ah ayaa loo isticmaali kara wax iibsi (Faqrada 10-aad ee Wareegtada).

II. Arrimaha muhiimka ah ee nidaamka wax soo iibsiga ee degdega ah

20. Mabaadi'da aas-aasiga ee wax iibsiga guud - sida qiimaha ugu wanaagsan, tartan furan, hufnaan, fursadda oo loo simanyahay, cadaalad, iyo daahfurnaan, daacadnimo iyo isla xisaabtan - ayaa lagu dabaqayaa iibka degdega ah, inkastoo ay macquul tahay in xaalada markaas taagan ay muhiimad gaar ah siin karto wax ku oolnimada iyo wakhtiga ay qaadaneyso bixinta alaabta, dhismaha iyo adeegyada aadka loogu baahan yahay.

1. Qorsheynta iyo u diyaargarowga iibka

A. Wajiyada gurmadka dedega ah

21. Iibka degdega ah, oo ka mid ah gurmadka degdega ah ee guud, waa inuu noqdaa mid loo nidaamiyay qaab ka jawaabi kara xaalada degdegta ah ee markaa taagan, oo ay kamid-tahay xaalada uu gurmadka degdegi ah markaas maraayo. Sidaa darteed, hawlaha iyo nidaamka iibka ee socda xilliga gurmadka degdega ah iyo inta

[4] Taarikhda lasoo saaray Hagahaan, Maamulka wali lama dhisin. Ilaa laga dhisaayo, Maamulka waxaa loola jeeda Waaxda Iibka ee Wasaaradda Maaliyadda.

ay laegtahay ka leexashada nidaamka caadiga ah ee wax-iibsiga (haddii ay jirto) waxa ay ku xirantahay gaar ahaan xaalada ay mareeyso hawlaha gurmadka (eeg Wareegtada, faqradda 11-aad, iyo Shaxda 1-aad ee hoose).

22. Isticmaalka nidaamka iibka degdegta ah ayaa muhiimad gaar ah u ah xilliga ay cusubtahay xilliga xaaladda degdegta ah (gaar ahaan Wajiga 1-aad ee gurmadka ee la bilaabo kadib xaaladda degdegta ah). Markasta oo khatarta xaaladda degdegta ah ay sii yaraato, waa inay sii yaraataa baahida loo qabo isticmaalka nidaamka iibka degdegta ah, marka laga reebo xaaladaha qaar oo wali loo baahanyahay in wax si degdeg ah loo iibiyo.

23. Tusaale, kadib isla marka ay dhacdo musiibada, baahida loo qabo isticmaalka nidaamka iibka degdegta ah iyo ka leexashada nidaamka iibka ee caadiga ah ayaa ah mid daruuri ah marka lala barbardhigo xilliga kasoo kabsashada iyo dib-u-dhiska.

Shaxda 1-aad ee Wajiyada Gurmadka Degdegta ah iyo Nidaamka Iibkiisa

Wajiga Gurmadka	Shuruudaha	Tilmaamaha macquulka ah ee nidaamka iibka
Wajiga 1aad: **Musiibada marka ay dhacdo**	-Musiibada kadib, khatar ku aadan badqabka nafta, kaabayasha daruuriga ah iyo bey'adda. - Baahida loo qabo gurmad degdeg ah; gurmadka oo la daahiyo oo aan la aqbali karin.	- "Ka-jawabi karta" hawlaha wax soo iibsiga waa inay ahaadan kuwa ka jawaabi kara baahida markaa taagan. -In marba loo debciyo xannibaadaha nidamka iibka sida ku haboon, oo waafaqsan Wareegtada.
Wajiga Gurmadka	**Shuruudaha**	**Tilmaamaha macquulka ah ee nidaamka iibka**
		- Qandaraas toos ah ama wax soo iibsi toos ah oo leh tartan, taas oo ku saabsan wax soo iibsiga muhiimka u ah daruuriga u ah gurmadka degdegta ah, markii la oggolyahay (Lifaaqa A ee Wareegtada). - Dedejinta iyo isticmaalka nidaam la fududeeyay, hadii la oggolaado. - Oggolaanshaha hore in laga helo Guddiga Qandaraasyada (oggolaansho saameeyn tixanleh "blanket approval" ayaa la isticmaali kara mararka qaar oo laga leexanaayo nidaamka caadiga ah) ayaa laga yaaba in loo baahdo wajigaan. - Xulista qandaraaslayaasha hawlaha iyo adeegyada si fudud u fulin kara.

Wajiga 2-aad **Kasoo kabashada musiibada**	- Khatar musiibada ka dhalatay ee saameyn karta nolosha, hantida, kaabayashaa, iyo bey'adda oo xoogaa yaraatay, taasoo oggolaanaysa hawlaha gurmadka iyo soo kabashada.	- Isticmaalka nidaamka iibka degdega ah oo larabo inuu noqdo mid ku haboon xaalada markaa jirta. - Tixgelinta nidaamyada kale ee wax iibsiga sida kireeysashada alaab muddo gaaban, isticmaalida ama cusbooneysiinta heshiisyo horay ujiray (iyadoon waxba laga badaleyn daabacadda asalka ah ee qandaraaska), qandaraasyo guud (framework contracts). - Mideeynta nidaamka wax soo iibsiga.
Wajiga 3-aad **Dib-udhiska/ musiibada kadib**	- Emergency situation has been stabilized to some extent, allowing response to focus on reconstruction - Xaaladda degdega ah oo ilaa xad xasishay, taasoo oggolaaneysa in xooga lasaaro dib udhiska.	- Nidaamka wax iibsiga oo lagu soo celsho mid caadiga ah (inkastoo tartan xadidan la isticmaali karaa, oo waliba marmar la oggolaan karo in hawsha iibka la dadajiyo (iyadoo lagu saleynaayo iibka tooska ah ee tartank leh - Lifaaqa A ee Wareegtada). - "Dedejinta" wax soo iibsiga (boobsiinta, iyadoo la sameeyo tartanka; taas oo loo isticmaali karo kaabayaasha daruuriga ah).

24. Iyadoo la eegaayo xaaladaha kala duwan ee marka ka jira wajiyada kala duwan ee gurmadka degdega ah, qiimaha iyo shuruudaha kale ee qanaraasyada ayaa laga yabaa inay yihiin kuwo ku kala duwan musiibada kadib iyo waqtiyada danbe ee gurmadku degdega ahi uu ayaan socday (dib usoo kabasho iyo dib udhis). Sidaa darteed, ka leexashada shuruudaha iyo qodobada caadiga ah ee qandaraasyadda ee kujira dukumintiga xayeeysiinta, ayaa la aqbali kara.

25. Waa in la oggadaa, iyadoo lagu saleeynaayo hadba xaalada u qaaska ah xaaladda degdegta ah ee markaa jirta, iyo dabeecadda iyo hadafka laga leeyahay wax soo iibsiga, inay jiri karaan in wajiyada kala duwan ee gurmadka degdega ah iyo nidaamka iibka ee loogu talagalay waji kasta ay isku mar hawl-galaan. Tusaale ahaan, meelaha qaar ee musiibadu haleeshay, khatarta ka dhanka ah badqabka nafta, caafimaadka, hantida iyo adeegyada aas-aaska ee Dowladda ayaa laga yaaba inay wali jirto, halka meelahaas qaarna xaalada khatartu yaraatay.

B. Qiimeynta Xaaladda

26. Tallabada ugu horeeysa ee qorshaha iyo u diyaargarowga iibka degdega ah marka ay timaado xaalad degdeg ah, oo xooga saareysa arrimaha ugu muhiimsan ee taabanaya nidaamka iibka degdega ah (tusaale, dabeecadda, baaxada iyo goobta xaaladda degdegta ah, kaabayasha deeganka xaaladda degdegta ahi kajirto, oo ay ka midyihiin qalabka wax lagu raro ama lagu dejiyo ee meesha yaala (meelaha wax laga raro, gaadiidka wax rara iyo qalabka kale ee wax lagu rarao, ama lagu keydiyo iyo kuwa lagu daabulo) (eeg Lifaaqa 2-aad, Wajiga 1-aad Liiska-hubinta).

C. Shaqaalah iyo Awoodaha

27. Iyadoo la tix-gelinaayo dabeecadda, baaxadda adeegga, ballaca deeganka musiibadu saameysay iyo inta ay soconeyso nidaamka wax soo iibka degdega ah, hay'addaha ku shaqadaleh hawlaha gurmadka degdega ah

waa inay go'aamiyaan shaqaalaha ka hawl-galaya hawsha iibka ee loo baahanyahay, waliba qeexaan doorka, masuuliyadda loo wakiishay iyo meesha ay ka hawl galayaan, kadibna ay dhisaan kooxaha hawl-wadeenada ah ee dhaqangelinaaya hawlaha iibka. Sidaa darteed waxaa muhiim ah kor u qaadista iyo hubinta tayada iyo xirfada hay'addaha hawshoodu tahay go'aan ka gaarista shuruudaha wax soo iibsiga, qorsheynta, qandaraas sameeynta iyo bixinta iyo waliba maareynta qandaraasyada.

28. Sarkaalka Idman waa inuu siiyaa tilmaamo cadcad hawl-wadeenada iyo guddiyada fulina nidaamka wax soo iibsiga, oo ay ku jirto xadeeyn kasta oo ku aadan masuuliyadaha loo idmaday.

D. Baaxadda Iibka

29. Hay'adda wax soo iibsaneysa waa inay go'aamisaa baaxda, oggolaanshiyaha loo baahanyahay iyo waqtiga lasoo iibinaayo waxyaabaha gurmadka wajiyadiisa kala duwan u baahanyihiin, oo ay ka midtahay ka jawaabista musiibada marka ay dhacdo kadib, xilliga kasoo kabashada iyo xilliga dib-udhiska. Arrimaha saameynta kuleh inta ay la'egatahay waxa lasoo iibinaayo, sida nuuca alaabta, dhismaha ama adeega loo baahanyahay si loo fidiyo gurmadka degdega ah, in isla markii laga heli karo oo ay diyaar kuyihiin suuqyada iyo in kale, baahida hay'addaha u baahan waxyaabaha lasoo iibinaayo iyo nuuca iyo baaxada musiibada.

30. Si hawl-wadeenada loogu fududeeyo qorsheeynta wax soo iibsiga loogu talagalay gurmadka, Lifaaqa 3-aad waxa u tixayaa nuucyada waxyaabaha gurmadka degdega ahi u baahnaan karo.

31. Waxa loo soo iibinaayo gurmadka degdega ah waa inay ahaadaan inta ku filan si loogu guul gaaro hawlaha gurmadka. Sitaa loo cadeeyo, baaxda nidaamka iibka degdega ah waa inuu ku ekaadaa waxa loo baahanyahay oo keliya si looga jawaabo xaaladda degdegta ah (oo ay ka midtahay cadadka waxyaabaha loo baahanyahay iyo waqtiga hawshaasi soconeyso). Si looga hortago balanqaad wax soo iibsi ee aan loo baahneen, kudarisa qandaraaska qodob oggolanaaya in lasoo iibsan karo waxyaabaha dheeriga ah ee dhimanada muhiimad gaar ah ayuu soo kordhin kara. Haddii lasoo iibsado wax ka badan inta gurmadka degdegi ah u baahanyahay, hay'adda wax soo iibsaneysa mahooboona inay isticmaasho nidaamka iibka ee degdega ah.

E. Uruurinta Xogta Laiskala xiriirayo

32. Hey'adda wax soo iibsaneysa waa inay uruurisa, oo ay siida nidamka isgaarsiinta degdegta ah iyo warbixinta kale ee daruuriga ah (tusaale, caqabadaha soo wajiji kara hawlaha, culeeysyada ku imaan kara daabulidda iyo saadka) saraakiisha fulinaysa hawlaha iibka iyo ganacsatada iyo qandaraaslayaasha.

E. Qorsha Iibka

33. Markasta oo ay macquul tahay, nidaamka iibka ee degdegta ah waa in lasameeya oo keliya marka la diyaariyo qorshaha iibka:

(b) Qorshuhu waa inuu tixgeliyaa qiimeynta baahiyaha oo ay sameeyeen hawlwadeennada gurmadka degdega ah.
(t) Qorshaha laftigiisa waala fududeeyn karaa, iyadoo lagu daraayo inta ugu yar ee loo baahay ee ku aadan shuruudaha farsamo, cadad iyo waqti ee la xiriira alaabaha, adeegyada ama dhismayaasha, qiyaasta qiimaha, nidaamyada macquulka ah ee wax lagu soo iibin karo, meesha hawsha laga qabanaayo, nidaamka qaybinta and iyo arrimaha kale ee la xiriira hawlaha gaarsiinta gurmadka.

G. Maareynta Khataraha

34. Qorsheeynta iibka ee xiliyadda gurmadka degdega ah waxa ay u baahantahay in qiimeyn lagu sameeyo khataro kala duwan oo saameyn kara iibka loo baahanyahay in loo sameeyo gurmadka degdegta ah. Khataraha dhici kara - kuwaa oo ku kala duwanaan kara nuuca ay yihiin iyo baaxadooda, iyadoo loo eegaayo dabeecada xaaladda degdegta ah iyo wajiyada kala duwan ee gurmadka degdegta ah ee iibka loo sameeynaayo - waxay u kala qayb samaan inta nuuca ee lagu tilmaamay Shaxda 2-aad ee soo socota:

Shaxda 2-aad : Qiimeynta khataraha ka dhanka ah niidamka iibsiga degdega ah iyo sida loo yareeyn karo

Khatarta	Tusaalooyinka lagu qiimeyn karo khatarta	Tusaalooyinka tilaabooyinka laqaadi karo si loo yareeyo khatarta
Khatarta amniga	Qiimeynta badqabka laga musiibadu iyo hawlgalaayo saameyday, aminga meesha ee tusaale : ○ Jiritaanka qarxa; sida burbuka ○ In hay'adda Dowladda meesha; ○ In shirkadaha ay meesha, qeeyb soo Dowladda. miinooyin ama Musiibada iyo walxaha dabiiciga dhul ○ daadka kadib; shibilka ay ah tagi ee karaan agaarka ka oo qaadan iibsiga loo hawligali ay kara hay'addaha leeyahay karaan ka wax	○ Ukala kal hawlaha iibsiga ku saleynaaya qeeybi, qorhseyn wax adiga khatarta una soo oo jirta; ○ Kaasho maxalliga Isticmaal Qaramada Midoobay ka bulshada ah; hay'adda ee hawl-gala. ○ meesha
Khatar sameeynta iibka nuucan ah	○ ○ ○ Jiritaanka Macquulnimada ticmaali qabad; dukumintiyo ee soo karo ku Jiritaanka balanqaadka u tartanka fudud wax iibsan in saleeysan nidaamka ee hogaansanaanta iibka lagu karo. lais-cabirqaadasho wax-	○ Xooga saar inaad ○ wax kasoo ○ iibsato goobaha maxalliga ah; soo Xooga saar alaabata ibsashada ah caadiga la ee karo. heli Diyaari dukumintiyo fudud iyo qandaraasyo wax lagu soo iibsan karo. ○ Allow alternative bids to provide innovation (e.g., flexible delivery schedules) ○ Fursad sii kala tartamayaal aad duwan si uga xal dhibka hesho kara. imaan

		○ Ka tanaasulida shuruuda damaanadda wax-qabadka.	
Payment risk **Khatarta lacag bixinta**	○ ○ Macquulnimada toos loo qandaraasle-hoosadlayaasha. In lacag ay lacag daaho.	in ah siin dulsaar ka bixinta	si lacagta karo ah dhalaneyso lala	○ In la lacag oo badan caadiga la qeybweyn kamid lacagta heshiiyay alaabta raro. Bixinta	oggolaado horumaris ka midda ah bixiyo. oo ah lagu marka lasoo	ah ee
Khatarta keenista alaabta	○ In meelo kuwo iyo karo oo yaqaano,	lagu lagu gaadiid ay waliba lana	keeydiyo, qeeybiyo qaadi jiraan, la kireeyay.	○ In la qandaraaslayaasha gaari karaan ○ meelaha alaabta geeynaayo. Hawl-gelinta qalabka Dowladdu leedahay si loo fududeeyo in la alaabta meeshii geeyo loo rabay.	hubiyo	in ay la
Khatarta korjoogteenta	○ ○ Isticmaalka degdega loo lata-linta. ○ Whether NGO, sectors organized to contract In hay'addaha Dowliga bulshada	nidaamka ah helo civil are to monitoring performance aheyn,	iibka si adeega society sufficiently contribute aan ururada ah	○ Isticmaalka kale filiso ○ korjoogteynta (tusaale, shaqaaleeysiinta ○ lataliye-yaal).. Isticmaalka hay'addaha aan aheyn maxalliga iyo bulshada ah. Isticmaalka tiknoolijiyada (mobeelada, uu dayax-gacameedka)	hay'addo si'aad hawsha Dowliga ee ah ururada rayidka masawirada qaado	u

H. Ka-talagelinta baxda ay khuseeyso

35. Inta la awoodo, waa in laga tashtaa bulshada maxalliga ah ee musiibadu saameeysay arrimaha la xiriira qorsheynta iyo dhaqangelinta mashruuca, oo ay ka midtahay ka faaideysashada aqoonta ay uleeyihiin arrimaha maxalliga ah si loo sameeyo qiimeyn fiican ee la xiriirta baahiyaha jira.

I. Wadooyinka wax lagu soo iibsan karo

36. Haddii waqtigu oggolyahay, hay'addaha wax soo iibsanaya waa inay qiimeyaan wadooyinka ufuran oo ay wax kusoo iibsan karaan, oo ka koobnaan kara :

(b) Isticmaalka qandaraasyo horay ujiray iyo qandaraasyadda aan cayimneen: Si waafaqsan Wareegtada (Faqradda 14-aad), kahor inta aan la bilaabin nidaamka wax soo iibsiga degdega ah, hay'adda wax soo iibsaneysa waa inay qiimeysa inay macquultahay in la cusbooneeysiin karo ama la kordhin karo waqtiga qandaraasyo horay

ujiray. Qiimeeyntaan waa in lasameeya kahor inta la bilaabin nidaamyada wax soo iibsiga ee degdegta ah. Haddii uu jiro heshiis dhagan gal ah oo aan cayimneen (Framework Agreement) kaas oo si degdeg ah loogu soo iibsan karo alaabta, dhismayaasha ama adeegyada loo baahanyahay, waxaa haboon in marka hore latixgeliyo isticmaalka qandaraaskaas jira.

Tillaabadaan kowaad ayaa muhiim noqon karta marka ay adagtahay in si sax ah loo qiyaaso qiimaha waxyaabaha loo baahanyahay iyo mudada ay qaadaneyso, si loo fidiyo gurmad degdeg ah. Haddii qandaraas la kordhiyo, waliba maanka lagu haayo in lasii koedhiyo, waa in la isku dayaa in wax soo iibsi cusub ka bilaabo intii marar badan lasii kordhin laha qandaraas jira. Tani ayaa keeneysa, in waqti kordhinta qandaraaska ay fursad u siido in la qabto wax soo iibsi tartan ku dhisan. Wax-kabadal kasta ee lagu sameeynaayo qandaraas horay ujiray waa inuusan waxba ka bedelin ujeedada asalka aheyd ee qandaraaska.

(t) Wax soo iibsi mideeysan: Hay'adduhu waxa ay sameeyn inay ka wada shaqeeyan nidaamka iibsiga si ay uga jaawaba baahida gurmadka degdegta ah (tusale wax soo ibsi mideeysay) (Wareegtada, Faqrada 15-aad). Gaar ahaan, wajjiga 2-aad (kasoo kabashada), fursadaha ku aadan mideeynta wax soo iibsiga ee hay'addaha Dowladda iyo kuwa aan Dowliga aheyn waa in laga fikira, oo haddii ay macquultahay la dhaqangeliya.

(j) Nidaamka iibka ah ee la doortay: Tani waxay ka koobantahay, iyadoo loo hoggaansamaayo Sharciga (Qeybta IV iyo V) iyo Wareegtada, nidaamka iibka ee ku haboon xaaladda markaa taagan iyo wajiga gurmadka degdegi ahu uu maraayo.

I. Isticmaalka nidaamka iibka ee tartanka kooban - Sharciga (Qodobka 86.1(e)) ayaa ogol isticmaalka nidaamka iibka ee tartanka kooban si loo fidiyo gurmadka degdega ah. Isticmaalka nidaamkaan ayaa la tixgelin karaa wajiyada kala duwan ee gurmadka degdega ah sida ku cad Lifaaqa A ee Wareegtada. Nidaamka Iibka ee degdega ah ma oggolaanaayo in laga leexdo nidaamka caadiga ah ee degsan ee sharicgu u dejiyay in wax lagu soo iibsado. Balse, u isticmaalida nidaamka iibka tartanka kooban hawlaha gurmadka degdega ah waxa ay u baahantahay inay ka hesho oggolaanshiyo Guddiga Qandaraasyadda, iyadoo waafaqsan Lifaaqa A ee Wareegtada.

II. Isticmaal qandaraaska tooska ah: Iyadoo loo hoggaamsamaayo (Qodobka 89.1(e)), waxaa la ogolyahay in la isticmaalo qandaraas bixinta tooska ah marka ay jirto xaalada degdegta ah (markii xaaladda degdegta ah ay aad u darantahay ama aysan jirin wax tartami kara aysan jirin. Sharciga (Qodobka 105.1.b) ayaa oggolaanaaya in la isticmaalo hal il oo keliya marka lasoo iibsanaayo adeegyo latalin si" looga jawaabo musoobooyinka iyo latalinta loo baahanyahay musiibada marka ay dhacdo kadib".

Isticmaalka qandaraaska tooska ah markii ay jiraan xaaladdaha degdegta ah waxaa ay u baahantahay in marka hore laga helo oggolaanshiyo Guddiga Qandaraaska haddii waxa lasoo iibsanaayo ay ka qiimaha badanyihiin inta lagu xadiday Xeernidaamiyahay. Nidaamyada oggolaanshiyaha ee u gaarka ah hay'adda wax soo iibsaneysa, iyadoo lo hoggaansamaayo Qodobka 30.1(a) ee Sharciga, ayaa la dabaqaya marka la istcimaalaayo nidaamkaan wax soo iibsiga ee ka hooseeya xadidka lagu cayimay. Haddi ay tahay adeeg la-talin, cidda oggolaaneeysa waa guddiga iibka.

III. Nidaamka la hirgeliyay ee iibka - Markii ay jirto xaalad adag, intii la isticmaali laha qandaraas bixinta tooska ah/isticmaalka iibka ee hasha il (Qodobka 89.1(e) ee Sharciga) Wareegtadu waxa ay u baahantahay hay'adda wax soo iibsaneysa, inta ay macquul tahay, inay badiso tartanka. Tani waxaa lasameyn kara iyadoo laisticmaalyo nidaamyada iibka sida tartanka furan, tartanka xadidan iyo soo gudbinta qiimaha - iyadoo la ogolyahay in wax aan badneen laga leexdo/ ama labadalo nidaamka caadiga ah ah ee loo isticmaalo nuucyadaas iibka ee kor ku xussan.

Hay'adda wax soo iibsaneysa waa inay dalbataa in ka dalbata inay soo tartamaan qandaraaslayaal badan, inta markaas macquulka ah. Tani wa in loo sameeya qaab ku haboon oo u hoggaansan nidaamyada iibka, ee lagu cayimay Oggolaanshiyaha Iibka Degdega ah :

(b) Codsashada soo tartamid, iyadoo la isticmaalaayo codsi soo gudbin qiimo (RFQ) oo wax laga badalay.

(t) Codsashada soo gudbinta dukumintiyada tartanka, iyadoo la isticmaalaayo nidaamka soo tartamid oo wax laga bedelay.

(j) Soo iibsashada adeegyo latalin iyadoo la isticmaalaayo xulusaho ku saleeysan aqoonta iyo khibrada lataliyaha.

Markii qiimo, soo tartamid ama soo jeedin la codsado si looga bilaabo tartan iyadoo jirto xaalad oggolaaneysa in la isticmaalo qandaraas toos ah ama xulusho hal il ah (Sida uu qabo Qodobka 89.1(e) ee Sharciga) waxaa la dabaqaya nidaamka caadiga ah ee iibka, iyadoo la isticmaali karo:

(b) Nidaamka codsashada oo la fududeeyay - oo ay ka midtahay ka tanaasulid shuruudaha xayeeysiinta iyo isticmaalida usoo gudbinta codsiga si af ah, markii ay jirto xaalad degdeg ah oo adag (Wajiga 1-aad) ama iibsashada yaryar, iyadoo larabo in dib laga soo daro qoraal.

(t) Dadejinta waqtiga tartanka - iyadoo lasoo gaabinaayo waqtiga soo dirista qiimaha iyo dukumintiyada tartanka.

(j) Fududeeynta shuruuda damaanadda.

(x) Isticmaalidda dukimintiyada tartanka iyo qandaraasyadda, markii kuwaa ay soo bandhigaan hay'adda ku shaqada leh.

(kh) Ka tanaasulidda waqtiga cabasha sugida marki tani ay baneeneyso degdegnimada xaaladda.

Iv. Isticmaalka awoodda Dowladda - nidaamkaan, hay'adda wax soo iibsaneysa waxay isticmaaleysa shaqaalaheeda iyo qalabkeeda (Qodobka 87.1(f) ee Sharciga). Isticmaalka awooda hay'adda ma ahan in la hawl-geliyo shirkad, ha ahaato mid Dowladdu leedahay ama mid kale, oo loo dhisay inay heshiis lagasho hay'addaha Dowladda. Isticmaalka shirkadaha nuucaan ah waa in ay ahaadaan kuwa loo sameeyo si waafaqsan nidaamka iibka ee lagu dhigay Sharciga iyo Wareegtada.

V. Bulshada maxalliga ah oo wax laga soo iibsanayo -- tani waxaa kamida mashaariic ay bulshadu wado oo ay bulshadu si firfircoon uga qayb qaadanayso naqshadaynta iyo fulinta mashaariicda (Sharciga, Qodobka. 69.4).

37. Qodobbada la tixgelinaayo marka go'aan laga gaarayo nidaamka iibka ee la dabaqaayo:

i. wejiga lagu dabaqi karo ee gurmadka degdega ah nidaamka wax iibsiga ee nuucana ah iyo musiibadu heerka ay gaarsiisantahay.

ii. nooca soo iibsiga iyo qiimaha heshiiska.

iii. waqtiga wax soo iibsiga oo ku saleeysan baahida alaabta, shaqada ama adeegyada loo qabo iyo meesha looga baahan yahay.

iv. tirada qandaraaslayaasha, ama adeeg-bixiyeyaalka jira iyo awooddooda ay ku dabooli karaan baahiyaha hay'adda wax soo iibsaneyso ay qabto iyo waqtiga ay ku qaadank karto.

v. ilaa inta ay macquul tahay, iyadoo loo eegaayo xaaladda jirta, in la hubiyo tartanka ugu macquulsan.

38. Isticmaalka kooban/ xaddidan, qandaraasyada tooska ah/ xulushada halka il (adeegyada la-talinta) ama nidaamka la qaatay ee iibka ee loo isticmaalaayo gurmadka degdega ah waxay ay u baahnaan doona in Xafiiks Raisul-Wasaaraha ama hay'adda waxa iibsaneysa shaaciso xaalad degdeg ah, waxayna kale oo ay u baahan kartaa ogolaanshiyada Guddiga Qandaraasyada, haddii qandaraasku ka sareeyo qiimaha la xadiday, ee lagu cayimay Lifaaqa A ee Wareegtada, marka laga soo tago shuruudaha kale ee la xiriira in guddiga iibka iyo sarkaalka idman iyaguma meel marinayan.

(b) Doorbidida Shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah ee maxalliga ah: Marka ay jirto xaaladda degdegga ah, qabdaraaslayaasha maxalliga ah, qandaraasleyda iyo adeeg bixiyaasha ayaa laga yaabaa inay ugu wanaagsan yihiin inay bixiyaan badeecadaha, shaqooyinka iyo adeegyada loo baahan yahay si looga jawaabo xaaladda degdegga ah. Sidaa darteed waa in la qiimeeyaa awooda suuqa maxaliga ah, waliba la kordhina fursadaha ay ku heli karaan qandaraas shirkadaha ganacsiyada maxaliga ah, gaar ahaan Shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka (SMEs). Doorashada nuuca ah oo kale waxa ay beegsan doonaan tartamayaasha ku nool, ama ka ganacsada meelaha ay musiibadu haleeshay. Gaar ahaan hay'addaha maxalliga ah loo isticmaalin karaa nadiifinta burburka ka dhashay musiibada, dib-udhiska iyo hawlaha daabulidda alaabyada.

(t) Ka-qaybgalka deeq-bixiyayaasha iyo Hay'addaha aan Dowliga aheyn (NGOs): ilaa xad, deeq-bixiyeyaasha kale (oo ay ku jiraan hay'adaha Qaramada Midoobay) iyo/ama NGO-yada, kuwaas oo habraacooda wax soo iibsiga lagu dabaqi karo, waxay u badan tahay inay ku lug leeyihiin maalgelinta iyo/ama fulinta soo iibsiga degdegga ah.

i.Sidaa darteed waxaa lagama maarmaan, iyada oo qayb ka ah qorsheynta soo iibsiga degdegga ah, in lala xiriiriyo oo lala shaqeeyo hay'adahaas.

ii.Xiriirinta iyo isku xirka deeq bixiyayaasha iyo NGO-yadu waa in lagu saleeyaa waxa ay dhab ahaantii qabanayaan, ama qorshaynayaan in ay qabtaan meesha musiibadu ka dhacday, halkii ay ku salaysnaan lahaayeen oo keliya macluumaadka guud.

iii. Ilaa xadka soo iibsiga degdega ah ay deeq-bixiyeyaashu maal-geliyaan, hay'adda wax soo iibsanaysa waxay u baahan tahay inay hubiso u hoggaansanaanta shuruudaha soo iibsiga deeq-bixiyeyaasha.

2. Habraaca nidaamka Iibka

A. Bilaabida habka wax iibsiga

39. Tallaabada wax iibsiga ee ku salaysan xaaladaha degdegga ah waa in ay keentaa sabab ah in la galo habraacyada degdega ah iyo, sharaxaad kooban ah oo ku saabsan siyaalo kasta oo habka soo iibsiga la soo jeediyay uu uga baxayo hababka wax iibsiga ee caadiga ah, taasoo qayb ka ah macluumaadka la doonayo in ay ku jiraan Tallaabada Soo iibsiga Degdega ah (Lifaaqa B ee Wareegtada).

40. Waa in laga digtoonaado lagana fogaado soo iibinta aan laga baaraan-dagin lagana taxadarin, si loo hubiyo in si dhab ah loogu baahan yahay soo iibinta degdega ah ee la soo jeediyay oo ay wax ka tareyso gargaarka iyo gurmadka saameynta xaaladda degdegga ah ee jirta.

B. Codsiga ka qaybgalka

41. casuumadda tartanka iyo dukumintiyada codsiga waa inay si qayaxan u sheegaan in dacwadaha wax iibsiga lagu sameeyay xaalad degdeg ah oo waafaqsan wareegtada.

42. Iyadoo la raacayo sharciga iyo wareegtada, wey bannaan tahay in aan la sameyn daabacaadda illaa inta la filanayo Oggolaanshaha Soo iibsiga Degdegga ah (eeg Lifaaqa A ee Wareegtada). Intaa waxaa dheer, soo iibsiga adeegyada la-talinta ee xaaladaha degdegga ah, Xeerka 48.3 waxa uu ogolaanayaa in layska dhaafo daabacaadda ogeysiisyada lagu raadinayo soo bandigidda xiiseynta in lagu soo daro liiska xulashada.

43. Nidaamka Sharcigu dhigaayo ee wax lagu soo iibsanaayo (Xeer-nidaamiye 32(1)(d)) waxa uu ogolaanayaa in casuumada la soo bandhigo kahor inta aan la ansixin miisaaniyada, si loogu baaqsado dib u dhaca ku imaan kara dhamaystirka hannaanka wax iibsiga. Hase yeeshee, wax qandaraas ah lama geli karo kahor ansixinta miisaaniyadda. Tani waxay noqon kartaa arrin waxtar u leh hirgelinta soo iibsiga degdegga ah ee lagu sheegay lifaaqa A ee Wareegtada.

C. Isticmaalka wax iibsiga elektaroonigga ah

44. Soo iibinta degdega ah, illaa xad waa inay noqotaa mid macquugal ah oo la hirgelin karo, lana fuliyaa iyada oo laga faa'iidaysanayo website-ka Hay'adda iyo, haddii la heli karo, nidaamka dhexe ee wax iibsiga elektaroonigga ah ee DFS.

D. Soo iibsiga hal-abuurka

45. Marka la dajinayo takhasusyada farsamo iyo tilmaamaha kale ee loogu baahan yahay wax soo iibsiga loogu gol leeyahay dalabka qandaraasyada, hay'adda wax soo iibsanaysa waa inay, inta ay suurtogal tahay iyada oo loo eegayo dabiicada wax iibsiga, ku tiirsanaato faafaahinta waxqabadka ku saleysan takhasusyada xirfadeed, iyada oo ujeedku yahay helidda qiime udhigma lacagta, kuwaasoo noqon kara xalal halabuur leh.

E. Qiimaynta tartanka qandaraasyada

46. Waa in la dajiyaa shuruudaha iyo halbeegyada lagu qiimeenayo tartanka qandaraasyada, waana in la sameeyaa habkii lagu qiimeyn lahaa, iyadoo la eegayo kordhinta qiimaha adeegga lagu bixinayo lacagta, iyada oo la raacayo shuruudaha qiimaynta ee la siiyay tartamayaasha ka qeyb galaysa tartanka.

i. Hay'adda wax soo iibsanaysa waa in ay hubisaa, marka la samaynayo halbeegyada iyo shuruudaha qiimaynta tartanka, in muhiimadda ugu weyn la siiyo arrimo kasta oo marka lagu daro qiimaha macno u sameenaya in la aqoonsado, lays barbardhigo, sidoo kalena la ogaado tartamayaasha xirfadda uleh (tusaale ahaan, wakhtiga bixinta, goobta bixinta).

ii. In kasta oo ay tahay in ay si hufan, waxku'ool ah iyo dhaqaale ahaanba uga faa'iidaysato hantida dawladda iyada oo la eegayo duruufaha degdegga ah, cidda wax soo iibsanaysa loogama baahna in ay muujiso in ay gaartay qiimaha ugu sarreeya ee waxqabadka ay lacagta siisanayso.

iii. Sicirrada aan caadiga ahayn waa, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah, inay aqbalaad hore ka helaan Masuulka Oggolaanshaha.

F. Macquul ahaanshaha Qiimaha

47. Go'aaminta macquulnimada qiimaha waxa ay si gaar ah u khusaysaa soo iibinta degdegga ah, gaar ahaan marka aysan jirin wax tartan-qandaraas ah ama la sameenayo tartan kooban.

48. Go'aaminta macquulnimada qiimaha ee tartanka kooban waxay ku lug leedahay falanqaynta macluumaadka soo socda, oo ay ku jiraan:

(b) Sooyaalka iibsiga alaabta lamidka ah qandaraaskan oo ay sameysay hay'adda ama hay'ado kale, iyada oo la tixraacayo qiimaha lagu iibsaday iyo qiimaha hadda taagan taas oo loo arko inay macquul tahay.

(t) Isbarbardhigga qiyaasta qiimaha cidda wax soo iibsaneysa.

(j) Isbarbardhigga qiimaha halbeegga qandaraaslaha ee shaqada iyo heerka shaqada ee Soomaaliya.

(x) Isbarbardhigga kharashka shaqaalaha dibadda laga keenay iyo kharashka shaqaalaha gudaha.

(kh) Qiimayaasha dowladda ama cidda soo saartay alaabta iyo isbeddellada qiimaha ay ka tarjumayaan.

49. Intaa waxaa dheer in la tixgeliyo, in qiime ka sarreeya midka caadiga ah la bixin karo sababo la xiriira baahi taagan oo loo qabo alaabaha qaarkood, ama in wax la gaarsiinayo goobo halis ah, iyo xaaladaha kale ee u gaarka ah xaaladda degdegga ah. Sidoo kale, hay'adaha wax soo iibsanaya waa inay ka feejignaataa oo ay la socotaa noocyada iibka ee shakiga leh (gaar ahaan marka ay wax ku iibsaneyso qiimo sare).

50. Shuruudda loogu baahan yahay in laga helo alaab-qeybiyaha/qandaraaslaha/lataliyaha ayaa sidoo kale lagu dabaqayaa xaaladaha degdegga ah.

G. Codsiga habraacyada dib u eegista cabashooyinka

51. Nidaamyada dib u eegista cabashooyinka ee sharciga (Qaybta VIII) ayaa lagu dabaqayaa xaaladaha soo iibsiga degdega ah. Si kastaba ha ahaatee, xoogaa dabacsanaan ah ayaa la oggol yahay xaaladaha degdegga ah. Qodobka 68 iyo 74 ee sharciga waxa ay bixinayaa reebid ku saabsan xaaladaha deg-degga ah oo la xiriira shuruudaha muddada joojinta. Sharcigu (Qodobka 165.7) waxa kale oo uu oggolaanayaa – iyaddoo la tixgelinayo danta guud ee xaaladaha degdega ah (sida masiibooyinka dabiiciga ah iyo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka) -- ka dhaafida hakinta dacwadda soo iibsiga ee caadiyan ay keento u gudbinta cabashada Guddiga

Madaxbanaan ee Dib-u-eegista Cabashada. Dabacsanaanta noocan oo kale ah waa in la isticmaalo oo keliya haddii ay jirto duruuf.

3. Samaynta heshiisyada, qaabeynta iyo maamulka

52. Si looga jawaabo nooca xaaladda degdegga ah, iyo heerka wax-ka-qabashada degdega ah, hay'adaha wax soo iibsanaya waxay haystaan xulashooyin kala duwan oo ah qaabka, samaynta iyo waxyaabaha ay ka koobnaanayaan qandaraasyada.

A. Qaabka qandaraaska

53. Qandaraaska waa inuu ku habboon yahay ujeedka loo sameenayo, iyadoo la tixgelinayo arrimo ay ka mid yihiin dabiicadda iyo inta la filayo inay sii jirto xaaladda degdegga ah, mawduuca iyo qiimaha qandaraaska, tartanka suuqa, xaaladaha dhaqaale ee jira, iyo dukumeentiga qandaraask ee la heli karo si ay u isticmaalaan cidda wax soo iibsaneysa. Iyada oo ay ku xiran tahay duruufaha, haddana waxyaabaha suurtagalka ah in la isticmaalo waxaa kamid ah:

(b) Iyadoo la raacayo wax kasta oo xaddidaya qiimaha lagu dabaqo oggolaanshaha marka la sameenayo wax soo-iibsiga degdegga ah, soo-iibsiga iyadoo la adeegsanayo codsiyada qiimaha adeegga (request for quotation) ama hababka heshiiska tooska ah, waxaa laga yaabaa inaan loo baahnayn qandaraas qoran; Isticmaalka agabka sida dalabaadka iibka ama qaansheegyada kuwan oo laga yaabo inay ku filnaato buuxinta shuruudaha dukumeentiga ee sharciga.

(t) Qandaraasyada wakhtiga-iyo-agabka iyo kuwa ku saleysan saacadaha shaqada.

(j) qandaraasyada qiimaha go'an VS qandaraasyada qiimahooda laga gorgortamo.

(x) Qandaraasyada Xaashida -- qandaraasyada hordhaca ah ee laga yaabo in la isticmaalo marka cidda wax soo iibsaneysa ay u baahan tahay bixinta alaabo degdeg ah, adeegyo ama hawlo, islamarkaana aysan jirin waqti lagu sameeyo qandaraas qayaxan kahor inta aan waxqabadka la billaabin. Qandaraaska xaashida waa inuu ka kooban yahay jadwal si loo qeexo heshiiska (sida, sheegidda faahfaahinta) kaas oo, marka laga reebo xaaladaha aadka u daran, lagu dhammeystiri karo [3] maalmood, ama kahor inta boqolkiiba [40] waxqabadka qandaraaska la dhameystirayo, hadba kii soo hormara.

54. Qandaraasku waa in uu qeexaa muddada heshiiska ee la cayimay, iyada oo la eegayo in laga fogaado dibu-dhac ku yimaada waajibaadka qandaraaska si wax looga qabto xaaladda degdegga ah. Qodobbada heshiisku waa inay sidoo kale xaqiijiyaan xaqa ay hay'adda wax soo iibsanaysa u leedahay inay joojiso wax iibsiga si waafaqsan qandaraaska, taas oo ay kamid taha xaqa hay'adda wax soo iibsanaysa u leedahay inay soo gabagabeyso qandaraaska si isla-oggol ah (qod. 77).

55. Ilaa inta la heli karo lana dabaqi karo, hay'adda wax soo iibsanaysa waa in ay isticmaashaa foomamka caadiga ah ee dukumentiyada codsiga wax-iibsiga iyo shuruudaha qandaraaska, oo ay ku jiraan daabacado la fududeeyay ee loo isticmaalo soo iibsiga degdegga ah.

56. Waa in laga taxadaraa marka heshiiska lagu darayo lana qorayo qodobbada 'saameynta awoodaha rabbaaniga ah' (*force majeure),* iyadoo la eegayo nooca xaaladda degdegga ah ee lagu sameynayo soo iibsigan.

57. Qandaraasku waa in aanu samayn habayn qeybiye (supplier) gaar ah.

B. Lacag Bixinta

58. Dabacsanaanta suurtagalka ah ee loo sameenayo qandaraaslaha/qaybiyaha waxa ay n oqon kartaa in la siiyo heerar sare oo lacag hormaris ah.

59. Caddeynta lacag-bixintu waa inay u hoggaansanaantaa shuruudaha diiwaangelinta qandaraaska.

60. Isticmaalka lacag-bixinta elektarooniga ah (e-payment) ayaa ah habka fiican, haddii ay suurtagal tahay. Xaaladaha qaarkood, isticmaalka lacagaha mobilada ayaa habboonaan kara.

C. Kormeerka fulinta heshiiska

61. Isticmaalka tignoolajiyada (tusaale, geotagging, satellite imagery, mobile technology) waxa ay fududayn kartaa la socodka fulinta qandaraasyada wax iibsiga ee xaaladaha degdegga ah.

62. Inay dhinac saddexaad kormeerto oo ay la socoto fulinta qandaraaska, gaar ahaan bulshada rayidka ah, waxay gacan ka geysan kartaa xaqiijinta ujeedka soo iibsiga degdegga ah. Hay'adaha soo iibintu waxay awood u siin karaan bulshada rayidka ah inay helaan macluumaadka iyo jawaab celinnada, iyagoo isticmaalaya aaladaha internetka, warbaahinta bulshada iyo tiknoolajiyadda moobeelka gacanta.

IV. Ka-bixidda marxaladda soo iibinta degdegga ah

63. Haddii xaaladaha degdegga ahi ay dagaan oo ay fududaadaan, waa in la joojiyo isticmaalka hababka soo iibsiga xaaladaha degdegga ah. Nidaamyada soo iibsiga degdegga ah ee la qaatay waxaa la adeegsan karaa marxalado dambe oo wax loogu qabanayo xaaladda degdegga ah sida dib-u-dhiska kaabayaasha muhiimka ah (tusaale, ceelasha biyaha, bulaacadaha, tamar-dhalinta iyo qaybinta).

64. Howlaha ka-bixidda waxaa kamid noqon kara joojinta iibka hoos yimaada hal ama dhowr qandaraas, iyo sidoo kale haddii suurtagal tahay, wareejinta alaabaha saa’idka ah ama kuwa aan la isticmaalin, dib u kaydinta alaabaha loo adeegsado xaaladaha degdegga ah, iyo qiimaynta hawlaha soo iibsiga degdega ah iyo casharrada laga bartay.

I.V. Daahfurnaan iyo Isla-xisaabtan

1. Daahfurnaan

65. Mabda'a aasaasiga ah ee soo iibsiga ee ah in loo fuliyo si hufan oo daahfurnaan leh ayaa sidoo kale ku dabaqmeysa soo iibsiga degdegga ah.

i. Sidaas awgeed, habka soo iibsiga degdegga ah waa inuu noqdaa mid daah-furan oo si habboon loo diiwaangeliyo.

ii. Waa lama huraan in go'aannada la diiwaan geliyo si loogu sharaxo si waafi ah duruufaha iyo sababaha loo cuskanayo habraacyada soo iibsiga degdegga ah.

iii. Waa in la sameeyo lana dhowro diiwaanka hawlaha wax iibsiga iyo go'aamada la xiriira, iyo sidoo kale galalka qandaraasyada.

66. Marka laga soo tago ujeedooyinka daah-furnaanta, diiwaannada wax iibsiga iyo galalka qandaraasyada waxa ay lagama maarmaan u yihiin maareynta heshiisyada. Waxa kale oo ay sahlaan u diyaargarowga xaaladaha degdega ah ee mustaqbalka, iyo dib u eegis, xisaab hubin, baadhitaano iyo sidoo kale dib-u-eegista, hanti-dhowrka iyo la socodka xaaladaha soo iibsiga degdega ah.

67. Qoraalka dukuminti ee habka soo iibsiga degdega ah waa inuu ka koobnaadaa:

(b) Oggolaanshaha lagu galayo soo iibsiga degdega ah (Sarkaalka Oggolaanshaha iyo, ilaa xadka lagu dabaqi karo, ku dhawaaqida Xafiiska Raysal Wasaaraha iyo/ama ansixinta Guddiga Qandaraasyada).

(t) Dabiicadd iyo baaxadda soo-iibsiga.

(j) Sababta soo iibsigu muhiim u yahay, dabiicadda iyo heerka ay gaarsiisan tahay xaaladda degdegga ah, iyo duruufaha loogu baahan yahay soo iibsiga degdegga ah.

(x) Goobta alaabaha, hawlaha ama adeegyada looga baahan yahay.

(kh) Nooca habka wax iibsiga ee la isticmalayo iyo sharraxaadda dhammaan waxyaabaha la bixinayo iyo tallaabo kasta oo loo qaadayo in la sameeyo tartan lagu galo soo iibsiga.

(d) Aqoonsiga alaab-qeybiyeyaasha, qandaraaslayaasha, la-taliyayaasha laga dalbaday dalabaadka, iyo tixraaca liiskda/diiwaannnada iibiyeyaasha la ansixiyay.

(r) Qiimaha soo iibsiga.

(s) Dalabaadka adeeg la soo gudbiyay.

(sh) Shuruudaha iyo habraaca qiimaynta, isbarbardhigga iyo heerka dalabaadka.

(d) Nooca qandaraaska (oo ay ku jirto habka qiimaha, muddada, qiimaha go'an ama midka laga gorgortami karo).

(dh) Waqtiga la fulinayo qandaraask.

(k) macluumaadka tillaabooyinka muhiimka ah, go'aamada iyo dhacdooyinka marka la hirgelinayo qandaraaska soo iibsiga.

(m) Warbixinta soo iibsiga degdega ah, oo ay ku jirto macluumaadka lagu xusay xarafyada (a) ilaa (l), si waafaqsan sharciga (Qod. 31.2).

68. Shuruudaha keeydinta dukumitiyadda ee lagu tilmaamay Sharciga (Qodob 31.1) ayaa lagu dabaqayaa nidaamka wax soo iibsiga degdega ah.

69. Shuruudaha qoraalka iyo daabacaadda iyo iyadoo la raacayo sharciga iyo shuruucda khuseeya go'aamada heshiiska iyo natiijada dacwadaha soo iibsiga ayaa lagu dabaqayaa soo iibsiga degdegga ah. Intaa waxaa dheer, dhammaan qandaraasyada la bixiyo iyadoo la adeegsanayo hababka soo iibsiga degdegga ah ee qiimahoodu ka sarreeyo [$ 500,000] waa in si buuxda loo daabacaa, iyadoo ay ku jirto qiimaha qandaraaska iyo qodobbada lacag bixinta iyo gaarsiinta.

70. Shuruudaha dukuminti qoraalka ayaa sidoo kale la dabaqayaa marka la adeegsado habka go'aanka xoogga la isticmaalo.

71. Marka soo iibsigu ay maalgelinayaan deeq bixiyayaasha, dukumeentiyada waa la diiwaan gelinayaa loona gudbinayaa deeq bixiyaha. Waxaana kamid ah caddaynta xayaysiisyada ama dalabaadka adeegga; iyo caddaynta iibsashada (dalabka iibka, iwm.); caddaynta lacag bixinta; iyo dukumeentiyada kale ee laga yaabo in lagu qeexo shuruudaha deeq bixiyaha.

2. Isla xisaabtanka

72. Cadaadisyada dheeraadka ee xaaladda degdegga ah si loo gaarsiiyo si dhakhso ah ayaa kaga sii dari karta saraakiisha wax soo iibsiga iyo alaab-qeybiyeyaasha, marka ay samaynayaan soo iibsiga si wanaagsan. Anshaxa, iska horimaadka danaha iyo mabaadi'da iyo xeerarka lagu dabaqayo soo iibsiga guud ayaa sidoo kale lagu dabaqayaa soo iibsiga degdegga ah.

73. Caqabadaha dheeraadka ah ee lagala kulmay kahor maaraynta soo iibsiga degdega ah, waxay muujinayaan muhiimada ay leedahay dib u eegis iyo hantidhawr hore, iyo waajibaadka la shaqaynta habraacyadan.

74. Habka dalabka qandaraasyada iyo bixinta qandaraasyada soo iibsiga waa inay u hoggaansamaan nidaamka dib u eegista cabashada. Si kastaba ha ahaatee, muddada joojinta iyo qodobbada hakinta waa la dhaafi karaa (qodobada. 68, 74, 165.7; Wareegtada, Lifaaqa A).

75. Toban [10] maalmood gudahooda laga bilaabo dhamaystirka soo iibsiga degdega ah, oo ay ku jirto fulinta qandaraaska, ama kadib marka lasoo gabagabeeyo qandaraaska, sarkaalka awoodda u leh waa inuu u soo gudbiyaa Hay'adda warbixin ku saabsan habka ay ku jiraan macluumaadka ku xusan cutubka 67. Qaab-dhismeedka loo isticmaalayo warbixinta waxaa lagu sheegay lifaaqa 4. Samaynta warbixintu waxa ay buuxinaysaa shuruudaha diyaarinta warbixinta lagu sheegay sharciga (art. 31.2).

76. Shaacinta warbixinta soo iibsiga deg-degga ah waxay ku xiran tahay xeerarka lagu tilmaamay sharciga (Qod. 31.6 iyo 7), mutatis mutandis.

V. U diyaargarowga soo iibsiga kahor xaaladaha degdegga ah

77. Kahor inta aysan imaan xaalad degdeg ah, waa in hay'adaha iyo maamulada dhexe ee awooda leh ay qaadaan tillaabooyin loogu diyaargaroobayo soo iibsiga wax loogu qabanayo xaaladaha degdegga ah, laguna yareenayo dibudhac imaan kara.

78. Tallaabooyinka la qaadi karo si loo kordhiyo diyaargarowga soo iibsiga degdegga ah waxaa ka mid ah:

(b) Qiimaynta casharradii iibsiga ee laga bartay xaaladihii degdega ahaa ee hore (iyada oo la tixgelinayo nooca xaaladaha degdega ah iyo baahiyaha la xiriira, habraacyada la isticmaalay, qoondaynta doorarka iyo masuuliyadaha, maalgelinta wax iibsiga la xiriira, isticmaalka qandaraasyadii hore, caqabadaha saadka ee lagala kulmay bixinta sahayda iyo adeegyada iyo xalalka la la isticmaalay, xog uruurinta, kormeerka fulinta qandaraaska iyo cabbirka).

(t) Iskudaridda hawlah iibsiga ee musiibada qaranka iyo qorshaha maareynta khatarta.

(j) Qeexida shaqooyinka muhiimka ah, doorarka iyo mas'uuliyadaha go'aan gaarista, ansixinta iyo hirgelinta soo iibsiga degdegga ah, iyo isu imaatinka macluumaadka xiriirka (oo ay ku jirto cusboonaysiinta xilliyeed).

(j) Qoondeyda iyo garashada agabka xarumaha wax iibsiga degdegga ah iyo kooxaha.

(x) Nidaamyada la dardar geliyay ee wax ka beddelka ergada hay'adda si loo xoojiyo ka-jawaabta degdegga ah ee soo iibsiga, gaar ahaan marka ay musiibado dhacdo.

(kh) Abuurista koox khubaro wax-iibsi ah oo leh xirfadaha iibsiga degdeg ah si dhaqso raro waxyaabaha degdega ah ee la doonayo.

(r) La xiriirka deeq-bixiyeyaasha iyo NGO-yada laga yaabo inay ku lug yeeshaan wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah.

(s) Suuragelinta isticmaalka mareegtada dhexe ee wax-iibsiga internetka ee DFS iyo nidaamka wax iibsiga elektaroonigga ah.

(sh) Diyaarinta iyo soo saarista qaababka qandaraasyada iyo dukumentiyada soo iibsiga degdega ah, foomamka iyo galalka si loo adeegsado inta lagu guda jiro nidaamka wax iibsiga.

(d) Qiimaynta waxa loo baahan karo in la soo iibiyo iyo caqabadaha saadka ee laga yaabo in lala kulmo, iyadoo la tixgelinayo qiimaynta habraacii lagu dabaqay xaaladihii degdega ahaa ee hore iyo natiijooyinka la gaaray.

(dh) Horey u-aqoonsiga alaab-qeybiyeyaasha/qandaraaslayaasha/la-taliyayaasha bixiya badeecadaha, shaqooyinka iyo adeegyada (ay ku jiraan adeegyada gaadiidka) kuwaas oo laga yaabo in si adag loogu baahdo jawaabta degdegga ah (in la cusboonaysiiyo xilliyo).

(k) Samaynta heshiisyo qaabaysan oo lagu iibsanayo wsxyaabo gaar ah marka ay soo ifbaxdo xaaladda degdegga ah.

(m) Diyaarinta iyo meeleynta agabka hawl gelinta xirfadlayaasha wax iibsiga (si gaar ah nuqulka Wareegtada iyo hagahan, aaladda wireless-ka, laptop-ka, liiska lambarrada xiriirka muhiimka ah iyo iimeellada, qariidada goobta iyo dulleeyadeed, nooca faylasha qandaraasyada taas oo ku jirto qandaraasyo maran iyo foomamk kale ee loo baahan yahay si loo habeeyo soo iibsiga).

(n) Iyadoo loo eegayo horumarinta isla-xisaabtanka bulshada, samaynta habablagu hawlgelinayo talooyinka bulshada rayidka ah u diyaar-garowga soo iibsiga degdegga ah, iyo la socodka fulinta soo iibsiga degdegga ah.

(h) Samaynta tababaro joogto ah oo ku saabsan hababka iyo qaababka soo iibsiga degdegga ah.

VI. Qiimaynta soo iibsiga degdega ah

79. Hoos waxaa ku xusan tiro shuruudo ah/KPI oo lagu qiimeeyo waxqabadka soo iibsiga degdega ah ee heer kasta oo silsilada wax iibsiga ah. Qiimayntan, oo ah qayb muhiim ah oo ka mid ah casharrada laga bartay waayo-aragnimada, waa in la sameeyaa kadib markii la dhammeystiro habka wax iibsiga, oo ay ku jiraan fulinta qandaraasyada. Gaar ahaan, waxay la xiriirtaa Hay'adda markay qiimaynayso guud ahaan u hoggaansanaanta hay'adaha iibinta ee qaab-dhismeedka soo-iibsiga, oo ay kamid yihiin Wareegtada iyo Hagidaan.

1. Qorshaynta

80. Tusaalooyinka tilmaamayaasha qiimaynta ee la xiriira qorshaynta soo iibsiga degdega ah waxa kamid ah:

(b) Aqoonsiga shuruudaha (marka la eego baaxadda iyo tirada) sax ma ahayd mana habboonayd?

(t) Maalgelin ku filan ma la siiyay soo iibsiga degdegga?

(j) Qandaraasyada jira ama qaabdhismeedka heshiisyada cidda wax soo iibinaysa, ama kuwa hay'adaha kale, ma la helay?

(x) Doorashada nooca qandaraas maku habboonayd ujeedka?

2. Habraacyada soo-iibsiga

81. Tusaalooyinka tilmaamayaasha qiimaynta ee la xiriirta habraacyada soo-iibsiga degdega ah waxa kamid ah:

(b) Ogaysiisyada ma lagu faafiyay internetka?

(t) Dalabyada shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexe (SMEs) ee maxalliga ah mala weydiiyay?

(j) Marka soo iibsiga la sameeyay iyadoo laga saaray habraacyada caadiga ah, heerka utartanka ma la gaarsiiyay ilaa inta suurtagalka ah?

(x) Qaab-dhismeedka qandaraasyada maloo dejiyay si waafaqsan shuruudaha sooiibsiga degdegga ah ee soo noqnoqda?

(e) Qandaraaska maloo galay si waafaqsan siyaasadda udhiibidda ergada shirkadaha ku habboon?

3. Maareynta qandaraaska

82. Tusaalooyinka tilmaamayaasha qiimaynta ee la xiriira maaraynta qandaraaska soo-iibsiga degdega ah waxa kamid ah:

(b) Mas'uuliyadda maareynta qandaraasyada si waafi ah ma loo cayimay?

(t) Fulinta qandaraasyada si waxku’ool ah ma loo kormeeray?

(j) Waxyaabaha qandaraaska mala gaarsiiyay goobihii saxda ahaa, tiradii lagu heshiiyay, waqtigii loogu talagalay, iyo/ama shuruudaha kale ee fulinta qandaraaska mala la buuxiyey?

(x) Lacag-bixinta qandaraaska ma la sameeyay waqti ku habboon?

4. Daah-furnaanta iyo Isla-xisaabtanka

83. Tusaalooyinka tilmaamayaasha qiimaynta ee la xiriirta daah-furnaanta iyo islaxisaabtanka soo iibsiga degdegga ah waxaa kamid ah:

(b) Habka soo-iibsiga si habboon ma loo diiwaangeliyay?

(t) Mala dabbaqay ansixintii ku habbooneyd iyo hababka la-socodka wanaagsan?

(j) Bulshooyinka ay saamaysay xaaladda degdegga ah maku qanceen adeeg bixinta?

Lifaaqa 1 Wareegtada Soo iibsiga Degdegga ah

Wasaaradda Maaliyadda

Wareegtada soo iibinta degdega ah

1. Wareegtadan waxa lagu soo saaray si waafaqsan qodobka 15(2) ee Sharciga iibka iyo qandaraasyada Qaranka (halkan loogu yaqaanno“Sharciga”). Waxay qeexaysaa shuruudaha lagu go'aaminayo marka soo iibsiga degdega ah ee waafaqsan Sharciga Iibka la samayn karo waxayna qeexaysaa habraacyada fulinta soo iibsigaas. Wasaaradda Maaliyadda ("Wasaaradda") waxa ay cusbooneysiin doonta Xeerarka Iibka si ay u taageerto hirgelinta iyo dhaqangelinta Wareegtadan.

QAYBTA A: Marka la isticmaali karo soo-iibsiga degdegga ah

2. Sharciga waxa uu ka baaraan degayaa in habraacyadaa soo-iibsiga ay u baahan yihiin la-qabsiga xaaladaha degdega ah. Xaaladaha degdegga ah waxay ka iman karaan dhacdooyin aan la saadaalin karin oo aan ahayn natiijada fal ay dib udhigi karto dhinaca Hay'adda iibinta. Noocyada xaaladaha ama dhacdooyinka soo socda waxay baneyn karaan in la isticmaalo hababka soo-iibsiga degdegga ah:

(b) Masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa dad-sameyska ah (tusaale, masiibooyinka deegaanka, la’aanta kaabayaasha muhiimka ah iyo agabka, xasaradaha caafimaadka bulshada oo ay ku jiraan cudurrada safmareenka ah iyo cudurrada sida baahsan u faafa, xaaladaha degdegga ah ee siyaasadeed sida dagaalklada iyo kacdoonnada rayidka).

(t) Xaaladaha amni ee degdegga ah ee ka dhasha falal dagaal, kacdoon ama argagixisanimo, iyo

(j) Dhacdooyinka aan la filayn, kuwaas oo aysan suurtagal aheyn inay wax ka qabtaan hay’adaha DFS ama aysan ka bixin karin adeegyada muhiimka ah.

3. Xaaladaha ku xusan farqadaha 2 (b) iyo (t), Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo kaliya ayaa ku dhawaaqi kara in duruufahaas ama dhacdooyinkaas ay dhaceen. Xaaladaha lagu sheegay farqada 2 (j), Hay'adda iibinta, iyada oo adeegsanaysa sarkaalkeeda oggolaanshaha, waxay ku dhawaaqi kartaa jiritaanka duruufahaas ama dhacdooyinkaas. Marka ku dhawaaqida ay sameeneyso Hay'adda iibinta, Sarkaalka Oggolaanshaha waa inuu diiwaangeliyaa ku-dhawaaqidda kahor oggolaanshaha habraacyada soo-iibsiga degdegga ah, sida lagu qayaxay Qaybta B ee Wareegtadan.

QAYBTA B: Oggolaanshaha soo-iibsiga degdega ah

4. Marka ay jirto xaalad degdeg ah iyo haddii danta guud ay dalbaneyso, isticmaalka hababka soo- iibsiga degdega ah waxaa codsan kara waaxda ka faa'iidaysiga ee Hay'adda iibinta. Codsiga waa in lagu sameeyaa qoraal waana in lagu caddeeyaa:

(b) Duruufaha jira ee oggolaanaya isticmaalka hababka soo-iibsiga degdegga ah, ha noqoto xaalad degdeg ah oo uu ku dhawaaqeyso Xafiiska Reysal Wasaaraha ama sarkaalka oggolaanshaha sida ku xusan faqradda 3-aad;

(t) Baaxadda, kala-horreysiinta iyo waqtiyeynta soo-iibsiga ee loo baahan yahay si waafaqsan marxaladda xaaladda degdegga ah. Marxaladaha xaaladda degdega ah waxaa lagu soo koobay faqradda 11-aad; iyo

(j) Sharaxaad kooban oo laga bixiyo soo-jeedinnada soo-iibsiga caadiga ah ee laga leexday. Waxyaabaha laga leexday ee habraacyada soo-iibsiga caadiga ah waxaa lagu sii sheegay faqradda 12-aad iyo lifaaqa A.

5. Oggolaanshaha in la dhaqaajiyo habraacyada soo iibsiga degdega ah waxaa bixin kara sarkaalka oggolaanshaha ee Hay'adda iibinta ay khusayso, marka soo-iibsiga degdegga ah uu kayar yahay $100,000, ama Guddiga Qandaraasyada, wixii ka badan xaddigaas. Hay'adaha iibinta waxaa la xasuusinayaa in aan loo ogolayn inay kala qaybiyaan soo iibinta ujeedooyinka loogu baxsanayo tartanka iyo shuruudaha kale ee soo-iibsiga (Sharciga 27.5).

6. Qaabka ay Wasaaraddu soo saartay ee Lifaaqa B waa in loo istcimaalaa codsiyada isticmaalka soo-iibsiga degdega ah si waafaqsan Wareegtada. Qaabka lagu soo saaray lifaaqa C waa in loo adeegsadaa oggolaanshaha isticmaalka soo-iibsiga degdegga ah.

7. Marka soo-iibinta degdegga ah ay u baahan tahay ogolaanshaha Guddiga Qandaraasyada, Guddigu waa inuu tixgeliyaa nuxurka codsiga oo ay siiyaan aqbalaad qoraal ah shan maalin oo shaqo gudahood. Ansixinno maran ayay soo saari karaan Guddiga Qandaraasyada, kuwaas oo loo isticmaalayo noocyada haraacyada sooiibsiga ee loogu jawaabayo xaalad degdeg ah oo cayiman.

8. Shaqooyinka loo xilsaaray Guddiga Qandaraasyada ee ku cad faqradaha 5 iyo 7 waxay dheeraad ku yihiin hawlaha guddiga qandaraasyada ee ku xusan Xeerhoosaadka Iibka. Si loo taageero Guddiga Qandaraasyada, waxaa la sameyn karaa guddi farsamo marka loogu baahan yahay xaalado gaar ah oo degdeg ah, si ay u dabagalaan fulinta siyaasada soo iibsiga degdega ah, waxaana kamid noqonaya khubaro aqoon iyo farsamo durugsanu leh baahiyaha ka-jawaabista xaaladaha degdega ah, si markaa soo-iibsiga si degdeg ah loo meelmariyo.

9. Marka ogolaanshaha la helo iyadoo la raacayo shuruudaha Wareegtadan, sooiibsigu waa inuu u socdaa si waafaqsan habka(hababka) wax iibsiga ee la oggolaaday. Ogolaansho kasta oo soo-iibsi degdeg ah waa inay Hay'adda iibinta kusoo wargelisaa Waaxda Iibka ee Wasaaradda sida ugu dhakhsaha badan kadib marka la soo

saaro. Dhammaan marxaladaha iyo wakhti kasta, soo iibsiga degdega ahi waa inuu ku xaddidnaadaa tirada badeecada iyo/ama adeegyada loo baahan yahay in wax loogu qabto xaaladda degdegga ah.

10. Lama ogola in laga leexdo habraacyada soo-iibsiga caadiga ah ilaa si gaar ah loogu xuso qoraalka oggolaanshaha. Waa in la dhaqangeliyaa shuruudaha faafinta go'aannada qandaraaska, sida uu dhigayo Sharciga 24.1, iyo ansixinta Guddiga Qandaraasyada kahor inta aan la saxiixin in ka badan xaddi gaar ah, sida uu dhigayo Xeer-nidaamiye 18.2.

QAYBTA C: Habraacyada soo-iibsiga degdegga ah

11. Marxaladda ay mareyso xaaladda degdega ah ayaa go'aamineysa nooca habraac ee soo iibsiga degdega ah ku habboon kaas oo qoraalka oggolaanshaha lagu codsaday, gaar ahaan marka la eego waxyaabaha laga leexanayo eek amid ah hababka sooiibsiga caadiga ah. Marxaladahan waxaa kamid ah:

Marxaladda 1-aad – kadib islamarka ay dhacdo musiibada ama nooca kale ee xaaladda degdegga ah ee khatarta degdegga ah galineysa nolosha, kaabayaasha muhiimka ah, deegaanka iyo baahida ka-jawaabista degdegga ah;

Marxaladda 2 – Marxaladda gurmadka/soo kabashada, taas oo khatarta degdegga ah ee ku wajahneyd nolosha, hantida, iyo kaabayaasha deegaanka ay hoos u dhacday ilaa xad;

Marxaladda 3 – Marxaladda dib-u-dhiska/ musiibada kadib, taas oo xaaladda degdegga ah la dejiyay ilaa xad, islamarkaana saamaxeysa in diiradda la saaro dib-u-dhiska.

12. Ka leexashada habraacyada soo-iibsiga caadiga ah ee lagu soo jeedin karo codsiga soo iibsiga degdega ah, iyadoo loo eegayo marxaladda xaaladda degdega ah iyo qiimaha la filayo ee qandaraaska in lagu bixiyo, waxaa kamid ah:

(b) Isticmaalka dukumentiyada soo-iibsiga iyo qandaraasyada ee diyaarsan;

(t) Dejinta waqtiyo ku habboon in lagu xaqiijiyo soo gudbinta Codsiga qiimaha adeegga, tartanka ama soo-jeedinnada; iyo,

(j) laalidda muddada hakinta heshiiska marka ay lama huraan u tahay baahida degdegga ah.

Lifaaqa A wuxuu bixinayaa hagid faahfaahsan oo ku saabsan habraacyada ku habboon, iyadoo loo fiirinayo marxaladda xaaladda degdegga ah iyo qiimaha la filayo ee soo-iibsiga.

13. Xaaladaha la isticmaalayo qaababka wax iibsiga ee aan ku saleysneyn tartanka furan, sida adeegsiga tartamada xaddidan ama kooban, ama marka qandaraaska si toos ah lagu bixinayo, ama marka ka-leexashada hababka caadiga ah ee qandaraaska la oggolaaday, waa in hay'adda iibinta ay masuuliyadda ugu badan iska saartaa ballaarinta tartanka iyo daah-furnaanta, sidoo kalena u dhaqantaa si waafaqsan hagidda ay soo saartay Wasaaradda. Tani waxay u baahan tahay weydiisashada in loo tartamo, lasoo gudbiyo soo-jeedinnada iyo codsiyada qiimaha adeegga sida ay usaamaxdo duruufaha, looguna tilmaamo xaaladda sida ku xusan lifaaqa A.

QAYBTA D: Hagida guud ee soo-iibsiga xaaladaha degdegga ah

14. Marka ay timaado baahida loo qabo in la sameeyo wax-iibsi degdeg ah, Hay’adda iibinta waa inay marka hore hubisaa in qandaraasyada jira ee bixinta badeecadaha iyo adeegyada lamidka ah, kuwaas oo markii hore lagu bixiyay habraac sax ah, loo isticmaali karo si loogu baaqsado baahi iib cusub. Si gaar ah, Hay'adda iibinta waa inay go'aamiso:

(b) Haddii uu jiro qaab-dhismeed heshiis oo ansax ah, kaas oo wakhtiga ku habboon ku keenaya badeecadaha, hawlaha ama adeegga la heli karo; ama

(t) Haddii ay suurtagal tahay in la cusboonaysiiyo ama in muddada loo kordhiyo qandaraasyada jira, Hay'adda iibinta waa inay raacdaa shuruudaha Sharciga Iibka ee jira ee arrimaha la xiriira ansixinta wax ka beddelka qandaraaska.

15. Haddii ay lagama maarmaan tahay iib cusub, Hay'adda iibinta waa inay sahamisaa fursadaha jira oo ee habeynta wada-shaqeyneed si loo haqabtiro baahiyaha soo-iibsiga degdegga ah (tusaale, soo-iibsiga wadajirka ah) si loo dhimo tirada qandaraasyada cusub ee u baahan kara in la bixiyo iyadoo la waafajinayo habraacyada iibsiga degdegga ah. Gaar ahaan Wajiga 2-aad (gurmadka/soo kabashada). Sidoo kale waa inay sahmisaa fursadaha suurtagalka ah ee iskaashiga hay'adaha kale ee dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn (NGO-yada), lana hirgeliyaa haddii ay ku habboon tahay.

16. Soo-iibsiga degdega ah, waa in mudnaanta la siiyaa fursadaha qandaraas ee ganacsiyada maxalliga ah (tusaale ahaan, ganacsiyada fadhigoodu yahay ama sida xoogga leh ugu ganacsada deegaannada iyo aaggga ay saameysay xaaladda degdegga ah).

Lifaaqa A. Qeexida habraacyada iyo shuruudaha ansixinta kahor soo-iibsiga degdegga ah

Qiimaha la qiyaasay	**Marxalada Xaaladda**	**Meelaha Ka Leexashada Nidaamyada Rootiinka ah**			
		Tartanka[5]	**Waqtiga**	**Dukumintiyada**	**Habraacyada ansixinta**
Kayar $100,000	**1** Isla-marka ay dhacdo	Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah, markasta oo ay suurtagal tahay ama qandaraaska si toos ah loo bixinayo	- Waxa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay ee lagu soo gudbinayo Dalabka Qandaraaska /Codsiga qiimaha - waxaa layska dhaafi karaa waqtiga hakinta	Isticmaalka dukumintiyada & qandaraasyada diyaarsan	Ka leexashada hababka caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha

[5] Isticmaalka dalabka xaddidan ama qandaraaska toos ah looma tixgalinayo ka leexasho habraacyada caadiga ah, balse waxay u baahan yihiin oggolaansho si waafaqsan Wareegtada.

	2 Sookabashada	Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah, markasta oo ay suurtagal tahay ama qandaraaska si toos ah loo bixinayo	- Waxa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay ee lagu soo gudbiyo Dalabka Qandaraaska /Codsiga qiimaha - waxaa layska dhaafi karaa waqtiga hakinta	Isticmaalka dukumintiyada & qandaraasyada diyaarsan haddii loo baahdo	Ka leexashada hababka caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha
	3 Dib-udhiska	Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah	- waxaa la codsan karaa xilliyada caadiga ah	Dukumentiyada tartanka caadiga ah	Ka leexashada hababka caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha
U dhaxeeya $100,000 illaa $1,000,000	**1** isla-marka ay dhacdo	Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah, markasta oo ay suurtagal tahay ama qandaraaska si toos ah loo	- Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – sooiibsiga degdegga ah ee loogu talagalay in lagu taageero kajawaabista xaaladda degdegga	Isticmaalka la oggol yahay ee dukumentiyada iyo qandaraasyada diyaarsan	Ka leexashada hababka caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada

		bixinayo	ah isla marka ay dhacdo - Waxaa la tixgelin karaa in laga tanaasulo muddada hakinta		
	2 Soo kabashada	Dalabka xaddidan markasta oo ay suurtagal tahay, ama Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah	-Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – ee loogu talagalay soo-iibsiga degdegga ah ee hawlaha gurmadka -Waxaa la tixgelin karaa in laga tanaasulo muddada hakinta	Isticmaalka la oggol yahay ee dukumentiyada iyo qandaraasyada diyaarsan haddii loo baahdo	Ka leexashada hababka caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada
	3 Dib-udhiska	Tartan Qandaraas oo Furan, markasta oo ay suurtagal tahay, haddii kale Dalabka Xaddidan ee qandaraaslayaal cayiman oo ugu yaraan saddex ah	- Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – ee loogu talagalay soo-iibsiga degdegga ah ee dibudhiska	Dukumentiyada tartanka caadiga ah	Ka leexashada hababka caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada

Ka badan $1,000,000	**1** isla-marka ay dhacdo	Tartan Qandaraas oo Furan, oo leh suurtagalnimada dardargelinta badeecadaha aadka loogu baahan yahay, haddii kale Dalabka Xaddidan oo ugu yaraan saddex codsi ah	-Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – ee loogu talagalay soo-iibsiga degdegga ah xilliga ay dhacd musiibada -Waxaa la tixgelin karaa in laga tanaasulo muddada hakinta	Use of streamlined documents & contracts if necessary	Ka leexashada hababka caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada
	2	Sameynta tartan qandaraas,	- Waxaa lasoo codsan karaa	Isticmaalka la oggol	Ka leexashada hababka
	Sookabashada	si loo dardargeliyo badeecada aadka loogu baahan yahay	waqtiyada lasoo gaabiyay – ee loogu talagalay soo-iibsiga degdegga ah ee hawlaha gurmadka - Waxaa la tixgelin karaa in laga tanaasulo muddada hakinta	yahay ee dukumentiyada iyo qandaraasyada diyaarsan haddii loo baahdo	caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada
	3 Dibudhaca	Tartan qandaraas oo furan	- Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada caadiga ah, si loo dardargeliyo soo-iibsiga degdegga ah ee loogu baahan yahay dib u dhiska	Dukumentiyada tartanka caadiga ah	Ka leexashada hababka caadiga ah u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada

Lifaaqa B. Foomka Codsiga Oggolaanshaha Iibka Degdegga ah

Tilmaamo:

1. Soo gudbi foomkan si aad u codsato oggolaanshaha iib kasta oo degdeg ah.

F.G: Haddii ay jirto khatar ku soo fool leh caafimaadka guud, baraaraha guud, ama badqabka dadwaynaha taas oo halis gelinaysa shaqada dawladda, dhowrista hantida, iyo/ama caafimaadka

ama badqabka dadka, soo buuxi foomkan isla markiiba KADIB marka ay jirto arrintan soo foolka leh.

2. U dir foomkan oo saxiixan dhammaan xiriirada hoos ku qoran:

Haddii qiimaha la qiyaasay uu ka hooseeyo $100,000: [geli magacas Sarkaalka Oggolaanshaha ee ay khusayso]

Haddii qiimaha la qiyaasay uu ka sarreeyo $100,000: [geli magacyada saraakiisha Guddiga Qandaraasyada iyo emailka, iyo madaxa Waaxda Iibka ee Wasaaradda Maaliyadda]

<table>
<tr><td>Magaca Hay'adda Iibinta:</td><td>Qiimaha la qiyaasay ee soo-iibsiga degdega ah:</td></tr>
<tr><td>Magaca Xiriirka Hay'adda Iibinta:</td><td>Taleefanka:</td></tr>
<tr><td colspan="2">Sharaxaad ka bixi xaalada degdega ah, sida ay u buuxineyso shuruudaha hoose, ku dar duruufaha ka dhigaya mid degdegg ah:

Sababta baahida ma ahan mid la sii qiyaasi karo:</td></tr>
<tr><td>Tilmaanta Xaaladda Degdegga ah:
(sax saar dhammaan kuwa khuseeya)
Waxay khatar ku tahay caafimaadka guud
Waxay khatar ku tahay baraaraha dadweynaha
Waxay khatar ku tahay badqabka dadweynaha</td><td>Waxay khatar gelineysaa shaqada dowladda
Waxay khatar gelineysaa dhowrista hantida
Waxay khatar gelineysaa caafimaadka ama badqabka dadka</td></tr>
<tr><td colspan="2">Alaabta loo baahan yahay, jadwalka waqtiga iyo meelaha la geynayo:</td></tr>
<tr><td colspan="2">Shuruudaha la codsaday eek amid ah Habraaca Soo-iibsiga Caadiga ah (sida la oggol yahay oo waafaqsan Wareegtada Iibka Degdegga ah):
Tartanka xaddidan: (hal mid sax saar)
Qandaraasyada xaddidan
Codsiga Qiimaha Adeegga
Hal Jih oo keliya: (haddii aad saxdo, bixi sababta kaa dhigeysa):
_____
Wakhtiyada la dardargeliyay: (sax saar dhamaan kuwa khuseeya)
Soo gudbinta dalabka qandaraaska/codsiga qiimaha – sheeg wakhtiga soo gudbinta dalabka:
_____
Ka-dhaafitaanka shuruudda hakinta - haddii ay jirto, sheeg muddada hakinta:
_____</td></tr>
<tr><td colspan="2">Isticmaalka dukumentiyada tartanka ee aan caadiga ahayn: (sax saar haddii ay jirto)</td></tr>
</table>

Iyadoo la Si waafaqsan Qodobbada 68, 74, 86, 89 iyo/ama 105 ee Xeerka Iibka Qaranka iyo Wareegtada MoF ee Soo-iibsiga Degdegga ah kuna taariikhaysan [taariikhda gelisa], waxaan codsanayaa oggolaanshaha isticmaalka habraacyada iibka degdegga ah sida kor ku xusan:

Saxiixa Codsadaha: _____

Magaca iyo Macluumaadka Xiriirka ee Masuulka hay'adda codsiga sameeneysa ee buuxinaya foomkan:

Magaca: _____

Email: _____

Tel: _____

Lifaaqa C. Qaabka Ogolaanshaha Soo-iibsiga Degdegga ah

Si waafaqsan faqradda 5-aad ee Wareegtada Iibka Degdegga ah, anigoo ah, [… *geli magaca iyo jagada*], waxaan oggolaanayaa iibka [ciwaanka hay'adda iibinta] ee alaabaha/hawlaha iyo/ama adeegyada lagu liis gareeyay Jadwalka 1, ee hoose, illaa qiimaha lagu tilmaamay Jadwalka.

Oggolaanshahan wuxuu ku salaysan yahay kuwan soo socda:

- Ku dhawaaqida Xaaladda Degdegga ah: [tilmaan OPM ama Oggolaanshaha ku dhawaaqida Sarkaalka Oggolaanshaha, iyadoo la raacayo Wareegtada Soo iibsiga Degdega ah, Faqrada 3]; iyo, ● Awoodda oggolaatay isticmaalka hababka degdegga ah: [ama sarkaalka oggolaanshaha ama guddiga qandaraasyada iyadoo la raacayo wareegtada soo iibsiga degdegga ah, Faqrada 5]

Oggolaanshahan wuxuu ku salaysan yahay waxyaabaha soo socda:

- Ku dhawaaqidda xaaladda degdegga ah: [*sheeg ku dhawaaqista Xafiiska Raysal wasaaraha ama Sarkaalka Oggolaanshaha ee Xaaladda Degdegga ah, si waafaqsan Wareegtada Soo-iibsiga degdegga ah, Faqradda 5-aad]*
- *Oggolaanshahan waxay dhaqan galeysaa* [… *geli taariikhda*] waxayna dhaceysaa [… *geli taariikhda*].

_____

[Saxeexa Maamulka Oggolaanaya isticmaalka habraacyada degdega ah ee kor ku xusan]
[Jagada]

_____

Taariikhda

JADWALKA 1

Badeecadaha, hawlaha, ama Adeegyada la soo iibinayo	Qiimaha la filayo ee badeecadaha, Hawlaha ama Adeegyada	Ka leexashada la oggolaaday ee habraacyada soo-iibsiga caadiga ah iyo shuruudo kasta uu ogolaanshahan ku xiran yahay	Taariikhda Ansixinta Guddiga Qandaraasyada (haddii ay jirto)

Qeybta 2 Liisaska hubinta marxaladaha wax ka qabashada xaaladda degdega ah

	MARXALADDA 1 – ka-jawaabista isla-marka ay dhacdo xaaladda		
	Talaabooyinka	**A/NA**	**Faallooyinka**
1	Dardargeli fahamka iyo micnaha guud ee xaaladda degdegga ah – sida: ○ Dabeecadda, heerka iyo goobta dhacdada ama duruufaha jira ○ heerka dhaawaca jireed ee ka dhashay, haddii ay jirto ○ xaaladaha amniga iyo badqabka (tusaale haddii ay jiraan miinooyin) ○ gelida aagga – ma waxaa jira xaddidaado ku aaddan cidda geli karta? Marar la gali karo, mise waa mid joogto ah? iyo khatarta miinooyinka? ○ Garashada badeecadaha, hawlaha, iyo adeegyada looga baahan yahay ka-jawaabista xaaladda, qiimaha la qiyaasay, iyo ilaha maalgelinta ○ qiimeynta u diyaarsanaanta saadka iyo awoodda ee aagga ay dhibaatadu saameysay ○ go'aanka in xaaladdu u baahan tahay in wax loogu qabto habraacyada soo-iibsiga degdegga ah iyo in kale		

2	Aqoonso jilayaasha ugu muhiimsan ee ku lug leh wax ka qabashada xaaladda degdegga ah (QM, deeqbixiyeyaasha, NGO-yada, ururada bulshada rayidka ah, hay'adaha kale ee dawladda, kooxaha bulshada), adiga oo ka eegaya ○ kartidooda iyo awooddooda, (tusaale, awoodda ay ku sameyn karaan soo-iibsiga loo baahan yahay) ○ hawlgallada dhabta ah ay sameyn fulin karaan ○ taageerada looga baahan yahay ○ awoodda ay u leeyihiin kormeerka iyo wada-shaqeynta ○ habboonaanta xeerarkooda iibka ○ isu-keen oo samee xiriirada degdegga ah ee la heli karo iyo macluumaadka kale ee khuseeya (caqabadaha fulinta, khataraha saadka ee iman kara, iyo carqaladaha alaab-qeybiyaha) ○ Sameynta Iskuduwidda iyo habaynta iskaashiga ○ Sameynta kanaalo joogto ah oo isgaarsiineed iyo warbixineed oo u dhexeeya kooxda soo-iibsiga iyo kooxda wax ka qabashada xaaladda degdegga ah		
3	Raadi ilaha ama suuqa maxalliga ○ Aqoonso alaab-qeybiyayaasha/qandaraaslayaasha/ adeeg bixiyayaasha, haddii wakhtigu saamaxayo		
	○ Hubi in soo-iibsiga loo baahan yahay laga heli karo ilo maxalli ah iyo in la isticmaalo ilahaas ilaa iyo inta suurtogalka ah		
4	Bulshada isticmaalayaasha waxay soo gudbinayaan dalabka soo-iibsiga; haddii dalabkaas ku codsadaan isticmaalka soo-iibsiga degdega ah, hubi inay jirto asbaab loogu baahan yahay		
5	Hubi in alaabta loo baahan yahay lagu heli karo qandaraas guud oo jira, qandaraas hay'ad iibin ama qandaraas lala galay shirkad kale, inta ay suurtagal tahay inay fursadahaan keeni karaan degdegsiimo iyo dardargelin		
6	Go'aami baahida shaqaale ee mashruuca soo-iibsiga		
7	Haddii farsamada lagu sheegay tallaabada 4 aanay suurtogal ahayn, adiga dooro habka soo-iibsiga ee la isticmaalayo ○ Marka go'aanka si madax-bannaan loo gaarayo, go'aami haddii ay lagama maarmaan tahay in laga tago hababka iyo habraacyada tartanka soo-iibsiga ee caadiga ah iyo in kale ○ Marka, si waafaqsan sharciga, isticmaalka so- iibsiga tooska la dammaanad qaadi karo xaaladaha degdegga ah, go'aami inta ay suurtagal tahay in la ballaariyo tartanka adiga oo codsanaya in lasoo gudbiyo in ka badan hal dalab iyadoo la raacayo habraacyada lagu sheegay wareegtada iyo Hagitaankan		
8	Raac amarada saraakiisha la igmaday iyo oggolaanshaha iyo nidaamyada xakamaynta, ama, iyadoo la raacayo Hagiddan, ergada degdegga ah ee horay loo dejiyay, iyo oggolaanshaha iyo habraacyada maamulka, iyadoo la tixgalinayo baahida loo qabo wax ka qabasho degdeg ah		
9	Ka faa'iidayso hababka elegtarooniga ah ilaa xadka la heli karo si loo fuliyo habraacyada soo-iibsiga, sidoo kalena qabashada shirarka guddiga iyo soo saarista ogolaanshaha		
10	Isticmaal dukumentiyada soo -iibsiga iyo qandaraasyada qaab-gaaban ee jira		
11	Aqoonso hababka habboon ee macquulka ah ee lagula socdo fulinta qandaraasyada		
12	U hoggaansan xeerarka anshaxa iyo xeerarka iska-hor imaadka danaha		
13	Samee diiwaanka hawlaha soo-iibsiga oo ilaali dukumentiyada iyo diiwaanka qoran ee soo-iibsi kasta		

	MARXALADDA 2 – Marxaladda gurmadka iyo soo kabashada		
	Tallaabooyinka	A/NA	**Faallooyinka**
1	Bulshada isticmaalayaasha waxay soo gudbinayaan dalabka soo-iibsiga; haddii dalabkaas ku codsadaan isticmaalka soo-iibsiga degdega ah, hubi inay jirto asbaab loogu baahan yahay		
2	Xaqiiji jiritaanka xaalado degdeg ah		

	Samee qorshayn ku habboon iyo tallaabooyinka is-diyaarinta oo ay kamid yihiin: o aqoonso codsiyada soo-iibsiga/baahida marxaladdan oo ay ku jirto qiimahooda la qiyaasay, sidoo kalena samey kala sareynta mudnaanta ○ **aqoonso jiliyaasha kale ee dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn ee ku lugta leh wax ka qabashada xaaladaha degdega ah, waxa ay sameynayaan, iyo inaad la yeelato wadashaqeyn inta ay suurtagal tahay** ○ **ka faa'iidayso tifaftirayaasha farsamada caadiga ah ee la heli karo, tartanka soo-iibka caadiga ah, dukumeentiyada qandaraasyada iyo qaababka diyaarsan**
3	**Hubi in alaabta loo baahan yahay lagu heli karo qandaraas guud oo jira, qandaraaska hay'adda iibinta, ama qandaraaska lala galay shirkad kale, haddii ay jiraan, waxay keeni karaan in si dardar leh lagu keeno**
4	**Hubi in alaabta loo baahan yahay laga heli karo ilo maxalli ah isticmaalna ilaa xadka suurtogalka ah**
5	**Haddii farsamada lagu sheegay tallaabada 4 aanay suurtogal ahayn, adiga dooro habka soo-iibsiga ee la isticmaalayo** **o Marka go'aanka si madax-bannaan loo gaarayo, go'aami haddii ay lagama maarmaan tahay in laga tago hababka iyo habraacyada tartanka soo-iibsiga ee caadiga ah iyo in kale o Marka, si waafaqsan sharciga, isticmaalka so- iibsiga tooska la dammaanad qaadi karo xaaladaha degdegga ah, go'aami inta ay suurtagal tahay in la ballaariyo tartanka adiga oo codsanaya in lasoo gudbiyo in ka badan hal dalab iyadoo la raacayo habraacyada lagu sheegay wareegtada iyo Hagitaankan**
6	**Ka faa'iidayso hababka elegtarooniga ah ilaa xadka la heli karo si loo fuliyo habraacyada soo-iibsiga, sidoo kalena qabashada shirarka guddiga iyo soo saarista ogolaanshaha**
7	**Isticmaal dukumentiyada soo -iibsiga iyo qandaraasyada ku habboon**

8	**U hoggaansan amarada saraakiisha la igmaday iyo oggolaanshaha iyo nidaamyada xakamaynta, ama, iyadoo la raacayo Hagiddan, ergada degdegga ah ee horay loo dejiyay, iyo oggolaanshaha iyo habraacyada maamulka**
9	**Sahmi suurtogalnimada qaababka iskaashiga wax iibsiga ilaa xad inta macquulka ah**
10	**Aqoonso hababka habboon ee macquulka ah ee lagula socdo fulinta qandaraaska**
11	**Markasta cusbooneysii maareynta soo-iibsiga, oo ay kamid tahay wakhtiyada keenista loo baahan yahay**
12	**U hoggaansan xeerarka anshaxa iyo xeerarka iska-hor imaadka danaha**
13	**Ilaali qoraalka dukumentiyada iyo diiwaannada qoran ee soo-iibsiga**

MARXALADDA 3 – Dibudhiska

	Tallaabooyinka	A/NA	**Faallooyinka**
1	Bulshada isticmaalayaasha waxay soo gudbinayaan codsiga soo-iibsiga: o ku dhaqangeli maamulka caadiga ah ee la igmaday ○ U laabo isticmaalka hababka soo-iibsiga caadiga ah o Ka-reebitaanka suurtagalka ah ee kaabayaasha muhiimka ah ee degdegga ah loo baahan yahay, markaas oo ujeedadu tahay in la kordhiyo o tartan xitaa haddii dardargelinta habraacyada lama huraan tahay o haddii codsiga uu dalbanayo isticmaalka soo-iibsiga degdega ah, kuna dar asbaabta sooiibsiga degdeg ah		
2	Markasta cusbooneysii maareynta soo-iibsiga, oo ay kamid tahay wakhtiyada keenista loo baahan yahay		
3	Qaad tillaabooyin la xiriira joojinta habraacyada soo iibsiga degdegga ah ○ Hubi in aad leedahay xaqa inaad joojiso soo-iibsiga qandaraaska gudihiisa ○ Dib u kaydi badeecadaha degdegga ah, sida loogu baahdo ○ Wareeji alaabaha xad dhaafka ah ama aan la isticmaalin ○ Qiimee hawlaha soo iibsiga degdega ah ○ Qaado casharadii aad baratay iyo agabka haray		
4	Aqoonso hababka habboon ee macquulka ah ee lagula socdo fulinta qandaraaska		
5	U hoggaansan xeerarka anshaxa iyo xeerarka iska-hor imaadka danaha		
6	Ilaali qoraalka dukumentiyada iyo diiwaannada qoran ee soo-iibsiga		

Qeybta 3 Liiska saadka & adeegyada muhiimka ah ee ka-jawaabista xaaladda degdegta ah

	Sheyga	**Lambarka alaabta**
	Batariyo	
	Bustayaal	
	Bacaha meydka	

	Baaldiyo	
	Agabka **safarrada** gaaban (sariiraha, miisaska, laambadaha, shooladaha, etc)	
	Mashiinka geedo-jarista	
	Alaabaha nadaafadda	
	naftada (badda)	
	naftada (shidaalka matoorka)	
	Saaridda xoolaha dhintay	
	Maacuunta **halka mar la isticmaalo**	
	Biyaha la cabbo	
	gawaarida iska-rogaha ah (kireyn)	
	Gawaarida culus ee dhulka gura (kireynta cagafcagafta, baldooska, gacmeyda, iwm)	
	Gawaarida culus ee dhulka gura (kireynta cagafcagafta, baldooska, gacmeyda, iwm – Adeegga farsam-yaqaanka)	
	Hoyga degdegg ah	
	Raashiinka degdegga ah	
	Agab-qubeyska degdegga ah	
	Doobiyo-bareeska	
	siligyada	
	Gargaarka degdegga ah	
	Tooshashka batariga	
	Nalalka waaweyn	
	batroolka	
	Dab-dhaliye	
	Galoofisyada (kuwa cinjirka ah, kuwa bacda ah, kuwa maqaarka ah)	
	Buruska	
	Gacamo-badiifiye	
	Qalabka gacanta (buruska iyo kashawiitooyinka)	
	Masaamiirta	
	Daryeelka caafimaadka – agabka dhayida (faashadaha iwm)	
	Daryeelka caafimaadka – daawooyinka	
	Kireynta Helicopterka	
	Daasadaha caanaha carruurta	
	Agabka nadaafadda (iskoobaha iwm)	
	Jaranjarooyinka	
	Taraqa	
	Agab-xafiiseedyada	
	Tuwaalada waraaqaha ah.	
	Qalabka ilaalinta shakhsiga ah	
	Barkimaha	
	Mutuneellada (darbiga)	

	Jikada la rakibo	
	Agab-qubeeska la rakibo	
	Musqulaha la rakibo	
	Qalabka korontada	
	Propane and butane	
	kuleeliyeyaasha	
	Raadiyaha AM/FM (batariga ku shaqeeya)	
	Dharka roobka	
	jaayga	
	Xargaha	
	Kabaha caagga ah	
	Jawaannada ciida iyo ciid	
	Majarafadaha (badiilka)	
	teendhooyinka	
	Darbaalka	
	fooneeyayaasha (la qaadi karo, oo ay ku jiraan ‘vehicle relay’)	
	Rasiifarada fooneeyayaasha, gudbiyeyaasha, iskujirka	
	gawaarida	
	Adeegyada lagu daaweeyo biyaha	
	Sifeynta biyaha (caafinta biyaha iyo agabka sifeynta)	
	Sifeynta biyaha (agabka iyo isticmaalka)	
	Tubooyinka biyaha	
	Haamaha biyaha	

Qebta 4 Qaabka Warbixinta ee Habka Soo iibsiga Degdegta ah

Hay'adda Iibinta: [… *geli magaca, cinwaanka, macluumaadka xiriirka]*
Tirsiga tallaabada soo-iibsiga: […]

1	Tilmaamidda mawduuca soo iibsiga	
2	Sababaha muhiimka ah ee isticmaalka habka soo iibsiga degdega ah, oo ay kamid yihiin o Sababaha isticmaalka hababka aan tartanka ahayn ama tartanka xaddidan ama ka ka-leecasho kasta ee habka soo iibsiga caadiga ah o Faahfaahinta dabacsanaan kasta oo la dabaqay si loogu leexdo hababka wax iibsiga ee caadiga ah	
3	Magaca masuulka oggolaanaya soo-iibsiga degdegga ah, iyo taariikhda oggolaanshaha, iyo taariikhda(aha) ansixin kasta ee ay soo saaraan Guddida Qandaraasyadu iyo waxa tallaabooyinka/habraacyada loo maray oggolaanshahan	
4	Aqoonsiga, cinwaanka iyo macluumaadka xiriirka ee alaab-qeybiyaha/qandaraaslah /la-taliyaha (-yaasha) qandaraaska lala galay	
5	Habka wax iibsiga (habraaca) iyo sharaxaada ka leecasho kasta oo habraacyada caadiga ah	
6	Macluumaadka qandaraaslayaasha ka qayb galaya (magacyada iyo cinwaanada), iyo heerka ka qaybgalka maxalliga ah	
7	Qandaraaslayaasha laga soo qaatay tartanka qandaraaska, awwoodahoooda, iyo shuruudaha u qalmida ee lagu qaatay	
	Soo koobida qiimaynta dalabyada/soo-jeedinnada	
8	Taariikhda billowga qandaraaska iyo taariikhda la dhameystirayo qandaraaska	
9	Qiimaha qandaraaska, lacagta [lacagaha] bixinta, iyo habka lacag bixinta	
10	Iyada oo lagu saleynayo go'aaminta qiimaha macquulka ah iyo heerka farqiga dhan qiimaha ah oo la barbar dhigo qiimayaasha lagu helo marka la adeegsanayo hababka wax iibsiga caadiga ah	
11	Goobta (aha) la gaarsiinayo	

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 17/08/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.137

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA MAAREYNTA HANTIDA DANTA GUUD IYO AGABKA DOWLADDA.

XRW - BIXIT
29 AUG 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **MOF/OM/1012/2023** ee ku taariikheysan Agoost 16,2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.43.08.23** ee **17/08/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.43.08.23 ee 17/08/2023,** kuna saabsan ansixinta Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda.

Qodobka 3aad

Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
IXAFIISKA RA'IISUL WASAARAHAI
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN-070-23
TAARIIKH : 06-09-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA MAALIYADDA

Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Maaliyadda *2023*

TUSMO

QAYBTA KOWAAD----------1

MABAADI'DA GUUD EE MAAREYNTA HANTIDA DAWLADDA----------1

Qodobka 1aad: Ujeeddada iyo Baaxadda----------1

Qodobka 2aad: Qeexid----------1

Qodobka 3aad: Kaalinta iyo Mas'uuliyadda----------2

QAYBTA LABAAD----------4

DIIWAAN-GELINTA HANTIDA DANTA GUUD IYO AGABKA DAWLADDA----------4

Qodobka 4aad: Diiwaan-gelinta Hordhaca ah ee Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda 4

Qodobka 5aad: Sumadeynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda ..... 6 **QEYBTA SADDEXAAD**----------6

MAARAYNTA HANTIDA DANTA GUUD----------6

Qodobka 6aad: Soo-iibsiga Hantida Danta Guud 6

Qodobka 7aad:Dayactirka Hantida Danta Guud 7

Qodobka 8aad: Kirada iyo Heshiisyada Dheef-wadaagga (Concessions) ee Hantida Danta Guud 9

Qodobka 9aad:U kala Wareejinta Hanti Dan Guud ama Agabka Laba Hay'ad Dawladeed 10

Qodobka 10aad: Burburinta Agabka Dawladda----------11

Qodobka 11aad:Ka tirtirida Agabka La-burburiyay Diiwaanka Hantida Qaranka---------12

Qodobka 12aad: Xisaabinta iyo Ka-warbixinta----------13

QEYBTA AFARAAD----------14

MAAREYNTA AGABKA DAWLADDA----------14

Qodobka 13aad: Maareynta Gaarka u ah Agabka Dawladda----------14

Qodobka 14aad: Soo Iibsiga Agabka----------15

Qodobka 15aad: Kaydinta Agabka Dawladda----------16

Qodobka 16aad:Habka Xaqiijinta iyo Hubinta Agabka----------17

Qodobka 17aad: Maareynta Agabka Dawladda----------17

Qodobka 18aad: Dhaqan-gal----------18

QAYBTA KOWAAD

MABAADI'DA GUUD EE MAAREYNTA HANTIDA DAWLADDA

Qodobka 1aad: **Ujeeddada iyo Baaxadda**

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu talo-galay in lagu hago maareynta hantida dantaguud iyo agabka Dawladda ee ku qeexan Qodobka 3(12), Qodobka 50aad iyo 51aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda.

2. Xeer-nidaamiyahan wuxuu kaabayaa, islamarkaana lala akhrinayaa Xeer- nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada markay taariikhdu ahayd 19/05/2022 (Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 140).

3. Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu dabaqaya si gaar ah, maareynta hantida danta guud iyo agabka Dawladda oo ay ka mid yihiin hantida guurtada ah, midda maguurtada ah iyo agabka (inventories) Hay'adaha Dawladda.

Qodobka 2aad: **Qeexid**

1. Ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:

   (b) **"Hantida Danta Guud":** Waxaa loola jeeda hantida ku xusan faqradda (2) ee Qodobka 50aad iyo 51aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019.

   (t) **"Agabka Dawladda":** Waxaa loola jeeda hantida guurtada ah oo ay Dawladdu leedahay oo ay ku jiraan balse aan ku koobneyn, dhammaan mishiinnada nuucyadooda kala duwan, gaadiidka, qalabka elegtarooniga ah, mishiinnada iyo qalabka warshaddaha, alaabta xafiiskayada, xoolaha nool, saadka, hantida dhextaala dhismayaasha Dawladda oo ay leedahay Dawladdu una isticmaasho fulinta adeegyada iyo hanti kasta oo kale oo guurta ah ee uu Wasiirku ku qeexo wareegto.

2. Erey kasta oo kale oo lagu dhex isticmaalo Xeer-nidaamiyahan ee aan lagu qeexin Xeer-nidaamiyahan laakiin lagu qeexay Sharciga ama Xeer-nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda ee 2022, wuxuu yeelanayaa macnaha lagu siiyay halkaas.

3. "**Sharciga**": waxaa loola jeedaa "Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019" **Qodobka** 3aad:

Kaalinta iyo Masuuliyadda

1. Wasiirku wuxuu dhisayaa Guddiga Hantida Danta Guud oo uu guddoomiye ka yahay isagu, kaasoo hawshiisu tahay dib-u-eegista iyo ka-talo-bixin arrin kasta oo saamaynaysa maamulka Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda.

2. Si waafaqsan Qodobbada 8aad iyo 9aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019, Wasiirku wuxuu mas'uul ka yahay:

   (b) Soo-saarista hagayaasha maaraynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda, si loo hubiyo in dhammaan hantida danta-guud iyo agabka Dawladda loo ilaaliyo, loona diiwaan-geliyo, loona xisaabiyo, isla markaana looga soo warbixiyo sida uga habboon.

(t) Samaynta nidaamka maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda oo la shaqayn kara Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

(j) Ansixinta codsiyada ka yimaada Hay'adaha Dawladda ee saamaynaya maaraynta hantida danta guud iyo agabka Dawladda.

(x) La-socodka, kormeerka iyo kor-joogtaynta hantida danta- guud iyo agabka Dawladda.

3. Si waafaqsan Qodobka 10aad ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud ayaa mas'uul ka ah:

(b) Soo-saarsita, isagoo la tashanayo Waaxda Hantida Qaranka iyo midda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda, hab-raac ku aaddan kala-soocidda hantida danta-guud iyo agabka Dawladda iyo dejinta Jaan-tuusyada Xisaabaadka (codes on the Charts of Accounts) oo muujinaya noocyada hantida danta- guud iyo agabka Dawladda si loogu adeegsado diiwaan-gelinta, kaydinta iyo ka- warbixinta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

(t) Soo-saarita, isagoo la tashanaya Waaxyaha Hantida Qaranka iyo Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda, hage muujinaya mabaadi'da xisaabaadka iyo hababka loo xisaabinayo qiimaha, qiimo-dhaca iyo khasaaraha ku yimaada hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

(j) Isagoo tixraacaayo diiwaannada ku jira gacanta Waaxda Hantida Qaranka, isku geynta iyo ku muujinta warbixinta xisaab xirka (balance sheet) qiimaha hantida danta-guud iyo agabka Dawladda JFS.

(x) Dhammaan hagayaasha iyo hab-raacyada uu soo saaro Xisaabiyaha Guud si waafaqsan faqrada (3) ee qodobkan, waa inuu ansixiyaa Wasiirka ka hor inta aan la hirgelin.

4. Sida ku cad Qodobka 8aad (3) ee Sharciga, Wasiirka ama sarkaalka Wasaaradda ka tirsan ee Wasiirku u wakiishay si waafaqsan Qodobka 26aad (1) ee Sharciga, ayaa masuul ka ah dib-u-eegista qorshaha maamulka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda oo ay Hay'adaha Dawladdu soo raaciyaan soo jeedinta miisaaniyada, si uu ugala taliyo inay waafaqsan tahay Qorshaha Maaliyadda ee Muddada Dhexe iyo in kale.

5. Si loo hubiyo in si hufan loo maareeyey hantida danta-guud iyo agabka Dawladda oo ay gacanta ku hayso Hay'adda Dawladeed, Sarkaalka Idman ee hay'addas Dawladeed, si waafaqsan Qodobka 12aad (2) ee Sharciga, ayaa mas'uul ka ah:

(b) Hubinta in si hufan loo isticmaalo hantida danta-guud iyo agabka Dawladda, lagana ilaaliyo dayac iyo burbur;

(t) Inuu ka ilaaliyo in hantida danta-guud iyo agabka Dawladda si xun loo isticmaalo;

(j) Inuu kormeero isticmaalka iyo xaaladaha ay ku sugan yihiin hantida danta-guud iyo agabka Dawladda;

(x) Inuu diyaariyo qorshaha maamulka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda iyo fulinta dayactirka hantida iyo agabka;

(kh) Inuu sameeyo diiwaan si joogta ah loo cusbooneysiiyo oo lagu kaydiyo dhammaan xogaha hantida danta-guud iyo agabka Dawladda, lana wadaago Waaxda Hantida

Qaranka ee Wasaaradda warbixinno ku saabsan nidaamka maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda iyo xaaladaha ay ku sugan yihiin.

6. Si loo xaqiijiyo gudashada waajibaadka shaqo ee loo idmaday Wasiirka si waafaqsan Qodobka 8aad (3) ee Sharciga, isla markaasna maanka lagu hayo mabda'a wakaalasho awood shaqo ee ku xusan Qodobka 26aad (1) ee Sharciga, ayaa Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda Maaliyadda loo xilsaaray ilaalinta iyo isku- dubbaridka maamulka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda JFS. Waaxdu waxay mas'uul ka tahay:

(b) Horumarinta iyo dhaqan-gelinta shuruucda, xeerarka, hagayaasha iyo nidaamyada kale ee lagu maareeyo hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

(t) Maamulidda nidaamka maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

(j) Kaydinta iyo joogtaynta diiwaan dhameystiran ee dhammaan hantida dantaguud iyo agabka Dawladda.

(x) Oggolaanshaha codsiyada uga yimaada Hay'adaha Dawladda ee diiwaan-gelinta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

(kh) Usoo-jeedinta Wasiirka inuu ansixiyo is-bedel kasta ee lagu samaynayo maaraynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn soo iibsashada, kireynta, wareejinta iyo iska-iibinta.

(d) Kormeeridda, la socodka iyo fulinta baarista iyo xaqiijinta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

(r) Kormeeridda, la socodka iyo kor-joogtaynta dayactirka hantida danta-guud iyo agabka ku jira gacanta Hay'adaha Dawladda.

(s) Dib-u-eegista iyo bixinta talooyinka ku saabsan qorshayaasha maaraynta hantida danta guud iyo agabka Dawladda oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn go'aan ka qaadashada isticmaalka, kiraynta ama bixinta heshiisyada dheef-wadaagga ah (concession) ee hantida danta guud iyo qorshaha dayactirka.

QAYBTA LABAAD

DIIWAAN-GELINTA HANTIDA DANTA GUUD IYO AGABKA DAWLADDA

Qodobka 4aad:
Diiwaan-gelinta Hordhaca ah ee Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda

1. Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda waa in ay samaysaa oo ay kaydisaa diiwaan dhamaystiran (Item Master) ee hantida ma-guurtada iyo guurtada ah ee Dawladda JFS, sida dhulka, guryaha, dhismayaasha, gaadiidka iyo qalabka, kuna kaydisaa xogtaan Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).
2. Hal sano gudihiis marka la soo saaro Xeer-nidaamiyahan, Hay'ad kasta oo Dawladeed waa in ay Diiwaanka Hantida Qaranka ee Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), gelisaa xogta loo baahan yahay iyo

macluumaadka hantida danta guud iyo agabka Dawladda oo ay maamusho, mas'uulna ka tahay. Diiwaanka Hantida Qaranka ee dhammaan Hay'adaha Dawladda ee Dawladda JFS, ayaa loo tix-gelinayaa diiwaanka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda ee midaysan.

3. Hanti danta-guud ama agabka Dawladeed ee kasta ee ku jira Diiwaanka Hantida Qaranka waa in laga hayo xogta soo socota:
   (b) lambar aqoosi oo u gaar ah (Unique ID) hantidaas danta-guud ama agabkaas Dawladda.
   (t) Nooca hantida danta guud iyo agabka Dawladda uu yahay oo ku salaysan Jaantusyada Xisaabaadka (codes on the Charts of Accounts) ee u dajiyay Xisaabiyaha Guud.
   (j) Magaca hantida danta-guud ama agabka Dawladda.
   (x) Xogta goobta ay taalo hantida danta-guud ama agabka Dawladda, oo ay ku jiraan macluumaad faahfaahsan iyo xogta cayiman ee goobta (geo information), haddii ay dhacdo in hantidu tahay hanti ma-guurto ah oo qiima leh.

   (kh) Taariikhda Dawladdu yeelatay;
   (d) Hay'adda Dawladda ee gacanta ku haysa hantida danta-guud ama agabka Dawladda.
   (r) Qiimaha Dawladdu ku soo iibsatay;

   (s) Muddada ay jirayso oo ay waxtarka leedahay ee Xisaabiyaha Guud uu jideeyay;

   (sh) Sida ay u qiima dhacayso ama ay u noqonayso dhaqan-ka-bax ee u jideeyay Xisaabiyaha Guud;

   (dh) Diiwaanka kormeerka iyo xaqiijinta (the inspection or verification log);

(c) Diiwaanka dayactirka oo ay jidaysay Waaxda Hantida Qaranka;

   (g) Macluumaadka kirada iyo heshiiska haddii hantida danta-guud ay tahay mid kireysan ama lagu bixiyay heshiis dheef-wadaag ah; iyo

   (f) Macluumaadka iibinta ama dhaqan-ka-baxa haddii agabka Dawladda la iibiyey ama uu noqday dhaqan-ka-bax,.

4. Haddii Hay'ad Dawladeed ay ku guul daraysato in ay diiwaan-geliso xogta ku saabsan hantida danta-guud ama agabka Dawladda oo ay iyadu gacanta ku hayso xiliga kama dambaysta ee lagu qeexay farqada (2) ee Qodobkan, Waaxda Hantida Qaranka oo ogolaansho ka helaysa Wasiirka, waxay:
   (b) Diiwaan-gelinaysaa hantida danta-guud ama agabka Dawladda iyadoo hantidaas ku suntaysa Hay'adda Dawladda ee mas'uulka ka ah; ama
   (t) Ku-wareejinaysaa hay'ad kale ee Dawladeed, hantidaas danta guud ama agabkaas Dawladda ee kujira gacanta hay'adda ku guuldaraysatay inay diiwaan-geliso.
5. Marka la dhammeeyo diiwaan-gelinta hordhaca ah ee hantida danta-guud ama agabka Dawladda ee ku xusan farqadaha (2) iyo (3) ee Qodobkan, dhammaan Hay'adaha Dawladdu waa inay xaqiijiyaan in dhammaan hantida danta-guud iyo agabka Dawladda ee magacooda lagu suntay inuu yahay mid si sax ah u diiwaan- gashan. sidoo kale, Hay'addaha Dawladdu waa inay muddo laba toddobaad gudihiis ah ku geliyaan Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) xogta hantidaa danta-guud ama agabkaa Dawladda kadib:

(b) Mar kasta ay soo saaran rasiidka helitaanka agabka (GRN) ee agab dhawaan soo galay gacanta Dawladda ama shahaadada dhammaystirka dhismaha ee la xariirta hantida danta-guud;

(t) Marka hanti dan-guud ama agab Dawladeed uu gacanta Dawladda ku soo galo deeq ahaan, mucaawino ama uu kadhasho dhamaystirka mashruuca; iyo

(j) Marka is-beddel lagu sameeyo hanti dan-guud ama agab Dawladeed oo horay u jiray.

Qodobka 5aad:
Sumadeynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda

1. Inta lagu guda jiro diiwaan-gelinta hordhaca ah, haddii hanti danta-guud ama agab Dawladeed aan lagu suntin Hay'ad Dawladeed, hantidaas ama agabkaas waxaa maamulaya Waaxda Hantida Qaranka, waxaana lagu suntaa Wasaaradda Maaliyadda.

2. Waaxda Hantida Qaranka waxay soo jeedin kartaa in hanti dan-guud ama agab Dawladeed oo aan ku suntaneyn wax hay'add Dawladeed ah, lagu sunto, lana hoos keeno hay'ad Dawladeed iyadoo lagu salaynayo:

   (b) Sooyaalka ama hab-dhaqanka la xiriira gacan ku haynta iyo maareynta hantida danta-guud ama agabka Dawladda ee noocaan ah.

   (t) Adeegyada danta-guud ee bixintooda ay hay'adaha Dawladda u adeegsanayso hantida ama agabka.

   (j) Baahiyaha ay Hay'ad Dawladeed u qabto hantida danta-guud ama agabka Dawladda si ay u gudato kaalinteeda iyo waajibaadkeeda shaqo.

   (x) Kaalinta iyo mas'uuliyadda ay Hay'ad Dawladeed iska saari karto ilaalinta iyo maaraynta hantida danta-guud ama agabka Dawladda iyadoo lagu salaynayo nooca ay tahay hantida danta-guud ama agabka Dawladda.

QEYBTA SADDEXAAD

MAARAYNTA HANTIDA DANTA GUUD

Qodobka 6aad:
Soo-iibsiga Hantida Danta Guud

1. Si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka, xeerarkiisa, haga-yaashiisa iyo Hagaha Hantida Danta-guud ee dhaqan galka ah, Hay'adaha Dawladda waa in ay diyaarsadaan qorshaha soo iibsiga hantida danta-guud, si loo waafajiyo qorshe sanadeedkeeda iibka iyo soo jeedinta miisaaniyadda.

2. Dhammaan kharash-bixinta, ha ahaado kharashka joogtada ah ama midka ra'sumaalka ee lagu soo gadayo hanti dan-guud oo cusub waa in lagu soo jeediyaa, laguna daraa Xeerka Qoondada Miisaaniyadda.

3. Codsi kasta oo lagu dalbanayo hanti dan-guud waa inay weheliso warbixin kooban ee habka lagu doortay, qiimaynta dhaqaale, khatarta jirta, soojeedin ku aadan nidaamka haboon in lagu soo gado hantida noocaan ah iyo miisaaniyadda lasoo jeediyay ee ku filan, kadibna loo dira Waaxda Miisaaniyadda. Marka ay hesho macluumaadka hore ku xusan, Waaxda Miisaaniyaddu waa in ay kala tashato:

   (b) Haddii arrinku uusan aheyn mashruuc, Waaxda Hantida Qaranka si ay u hesho talooyin dheeraad ah oo lagu biirin karo soo iibsiga hantida cusub. Waaxdu waxay tallooyin ka dhiiban kartaa:

   i. Jiritaanka hanti dan-guud oo lagu wareejin karo ama la siin karo hay'adda doonaysa hantida.

   ii. Sidda ay Hay'adda Dawladeed ee codsiga keentay ay ugu hoggaansan tahay shuruucda, xeerarka iyo hagayaasha dhaqan-galka ah ee la xiriira maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (t) Wasiirka, haddii hawsha soo gadashada hantida ay u baahantahay kharash ra'sumaal ama ay tahay maal-gelinta mashruuc guud.

4. Dhammaan hababka loo marayo soo gadashada hantida danta-guud waa in ay waafaqsan yihiin Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka, xeerarkiisa, hageyaashiisa, shuruucda iyo xeerarka kharash bixinta.

5. Hanti kasta oo ay Hay'adda Dawladeed ku hesho sifo deeq, hibayn ama laga maal- geliyey dibadda waa in loo aqoonsadaa inay tahay hanti dan guud waana in lagu qoraa Diiwaanka Hantida Qaranka, iyadoo la xusayo qiimaha hantidaas ku fadhido.

6. Kharashka lagu beddelayo hanti ku jirta gacanta Dawladda waa in loo xisaabiyaa kharashka lagu soo gadayo hanti cusub iyo midka la iska iibinayo hanti duugowday. Waaxda Miisaaniyadda iyo Xisaabiyaha Guud waa in macaamilka noocaan ah ugu kala muujiyaan miisaaniyadda iyo diiwaannada xisaabaadka inay kala yihiin kharash iyo dakhli si waafaqsan miisaaniyadda iyo diiwaannada xisaabaadka.

7. Marka la ansixiyo foojarka kharashka ku baxaya gadashada hantida ama shahaadada dhamaystirka iibka la galiyo Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), waa in Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) si toos ah hantida danta guud ama agabka Dawladda ee cusub uga diiwan-geliyaa Diiwaanka Hantida Qaranka ama uu ku sunto hay'adda Dawladda ee kharashka gashay.

Qodobka 7aad:
Dayactirka Hantida Danta Guud

1. Hay'adda Dawladeed ee mas'uul ka ah hantida waa in ay si joogto ah u samaysaa hubin iyo dayactir ku aadan hantida danta guud. Waa in hay'addu sidoo kale hantida danta-guud oo ay gacanta ku hayso ee lagu suntay ku ilaalisa xaalad wanaagsan, si loo xaqiijiyo

waxtarkooda, loona kordhiyo cimrigooda. Hay'adda Dawladeed ee mas'uul ka ah hantida waa in ay:

(b) Sameysaa jadwal dayactireed ee dhammaan hantida danta-guud ee qeexaya inta jeer ee la dayactirayo iyo baaxadda hawlaha dayactirka ee loo baahan yahay.

(t) Kaydisaa diiwaannada dhammaan hawlaha dayactirka oo ay ku jiraan taariikhda, faah-faahinta dayactirka la qabtay, iyo shaqaalaha mas'uulka ka ah dayactirka.

(j) Usoo bandhigtaa baaris marka laga codsado, diiwaanada dayactirka oo ay kaydisay.

2. Hay'adda Dawladeed waa inay si joogto ah u fulisaa dayactir kahor taga, si loo ogaado, loona dayactiro arrimaha u baahan dayactirka inta aysan noqon kuwa aan waxba laga qaban karin. hawlaha dayactirka kahor-taga ah waxaa ka mid ah saliidaynta, toosinta (calibration), iyo nadiifinta. balse kuma xadidna baaritaannada, Cilad kasta oo lagu ogaado inta lagu jiro hawlaha dayactirka kahor-taga ah waa in si degdeg ah wax looga qabtaa.

3. Hay'adda Dawladeed waa in ay si joogto ah u qaado dayactir lagu xallinayo arrimaha u baahan dayactir ee la soo ogaaday inay u baahnyihiin dayactir ama in isbedel lagu sameeyo. Isbedallada larabo in lasameeyo waa in loo maraa nidaamka uu jideeyay Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka. Hawlaha dayactirka ee keeni kara in hawlaha hay'adda joogsadaan waa in loo qorsheeyaa si maangal ah, si loo yareeyo caqabadaha ku imaan kara adeega iyo hawl-gallada hay'adda.

4. Dayactirka deg-degga loogu baahdo waa in si dhakhso ah loo sameeyaa, oo walxaha ay lagama maarmaanka tahay in la beddelo waa in loo helaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurto-galka ah, iyadoo la raacayo Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka.

5. Hawlaha dayactirka waa inay qabtaan shaqaale aqoon, tababar iyo khibrad ku habboon u leh shaqada.

6. Iyadoo la la tashanayo Waaxda Hantida Qaranka, Sarkaalka Idman ee Hay'adda, Agaasimaha Miisaaniyadda iyo Xisaabiyaha Guud waa in ay hubiyaan in la kala saaro kharashaadka joogtada ah iyo midka ra'sumaalka marka la dajinayo miisaaniyadda kharashka dayactirka.

7. Kharashaadka dayactirka joogtada ah waa in lagu daraa kharashka loo isticmaalayo agabka iyo adeegyada halka kharashka dayactirka ra'sumaalka lagu darayo kharashaadka ra'sumaalka oo loo badalayo laguna daro qiimaha hantida qaranka ee dib loo cusboonaysiiyey ee ku jirta Diiwaanka Hantida Qaranka.

8. Dayactirka buuxiya mid ka mid ah shuruudaha soo socda waa in loo aqoonsada dayactir ra'sumaal:

(b) Marka hantida danta-guud lagu sameeyo dayactir iyo dib-u-habayn ka dhigaysa hantidaas sidii mid cusub.

(t) Marka lagu daro ama laga bedello qayb muhiim ah hantida danta-guud.

(j) Marka hantida danta-guud loo yeelo isticmaal cusub.

(x) Marka la balaariyo awoodda hantida danta-guud.

(kh) Marka la balaariyo awoodda qaab-dhismeedka ee hantida danta-guud.

(d) Marka la kordhiyo cimrigeeda waxtarka leh ee hantida danta-guud.

9. Saddex bilood gudahood marka la soo saaro wareegtada miisaaniyada, hay'adda Dawladda ee mas'uulka ka ah hantida danta-guud ama agabka Dawladda waa in ay diyaarisaa qorshaha dayactirka hantida kaas oo muujinaya wax ka qabashada arrimaha ay ka mid ka yihiin burburka. Waa in loo diraa qorshahaan Waaxda Hantida Qaranka si ay dib-u- eegis ugu sameeyan una ansixiyaan. Markii ay soo gaarto, Waaxda Hantida Qaranku waxa ay:

   (b) Waaxda Miisaaniyadda kala tashanaysaa qorshaha dayactirka gaar ahaan arrinta qorshaha dayactirka ra'sumaalka.

   (t) Dib u eegis ku sameeynaysaa qorshaha dayactirka si ay talooyinka ku haboon uga dhiibato. Hay'adda Dawladeed ee hantida ka mas'uulka ah waa inay tix-gelisaa tallooyinka la siiyay marka la diyaarinayo, lana fulinayo Miisaaniyadda.

10. Iyada oo la raacayo hageyaasha iyo tilmaamaha uu soo saaro Wasiirka, dhammaan diiwaannada dayactirka hantida danta guud ama agabka Dawladda ee ku suntan hay'ad Dawladeed waa in lagu kaydiyaa Diiwaanka Hantida Qaranka, walibana laga arkaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

11. Hay'adda Dawladda waa inay gelisaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), sumada hantida danta-guud iyo faahfaahinta dayactirka lasameeyay, si loo abuuro foojarka kharash-bixinta la xiriirta hantidaan. Xogtaan waa in sidoo kale lagu diiwan-geliya Diiwaanka Hantida Qaranka si loo muujiyo qiimaha ku kacay dayactirka.

Qodobka 8aad:
Kirada iyo Heshiisyada Dheef-wadaagga (Concessions) ee Hantida Danta Guud

1. Khidmada iyo kharashka laga helo kireeynta iyo isticmaalka hantida danta-guud waa in loo maareeya si waafaqsan nidaamyada lagu dajiyay Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

2. Hay'ad Dawladeed waxa ay kireyn kartaa hantida danta-guud ee magaceedu ku suntan yahay marka ay oggolaansho qoraal ah ka hesho Wasiirka Maaliyadda iyadoo loo maraayo shuruucda dalka. Heshiis kasta ee ku aadan kiraynta hanti danguud oo ay gasho Hay'ad Dawladeed iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka helin Wasiirka Maaliyadda waa waxba kama jiran.

3. Haddii aan laga dhaafin iyadoo la racaayo Hagaha Maareynta Hantida Danta-guud, hanti dan- guud kasta ee la kireeyo waxaa laga rabaa lacag kiro ah, taas oo loo

   aqoonsanaayo dakhli aan aheyn canshuur. Dakhligan waxa si waafaqsan shuruucda dakhliga iyo maareynta maaliyadda guud usoo uruurinaya Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda.

4. Si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka, codsiyada ku aadan gelista heshiisyada dheef-wadaaga (concessions) ee hantida danta-guud waa in loo gudbiyaa Waaxda Farsamada ee Bixinta Qandaraasyada si ay qiimeyn ugu sameeyso, kadibna loo diro Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraasyada si loo ansixiyo.

5. Wasiirka ayaa ku qeexaya hagaha maareynta hantida danta-guud shuruudaha iyo mabaadi'da la rabo inay ku jiraan heshiisyada kireynta iyo heshiisyada dheef- wadaaga ee hantida danta-guud (concession agreement).

6. Haddii hantida danta-guud ay soo saarto dakhliyo ay ka mid yihiin khidmadda kirada, lacagaha ka soo baxa heshiisyada dheef-wadaaga ee hantida danta-guud (royalties) iyo khidmadaha iyo kirooyinka kale, waa in Sarkaalka idman ee Hay'adda Dawladda ee hantidaas ku suntantahay:

   (b) Ku dara odoroska dakhliga dhammaan dakhliga ka soo xarooda hantidaas si loo tixraaco marka la sameeynayo qoondada miisaaniyadda iyo saadaasha lacagta caddaanka ah;
   (t) Hubiyo in Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda uu ururiyo dakhliga soo xarooda, iyadoo loo marayo nidaamka dakhli ururinta ee ku xusan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, si taas loo fududeeyo, waa in lala wadaaga Wasaaradda Maaliyadda, heshiisyada kirada, dheef-wadaagga (concessions) ee hanti danta guud iyo dukumintiyada kale ee lama-huraanka u ah ururinta ujuurooyinka iyo khidmadaha kale ee ka soo xarooda hantida danta-guud;
   (j) Hubiyo in dakhliga ku soo xarooday habka elegtaroonig ah si toos ah loogu shubo Xisaabta Khasnada Mideysan, iyadoo la isticmaalaayo Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), waa in lala wadaago Xisaabiyaha Guud iyo Hanti Dhoowraha Guud dhammaan cadaymaha lacag bixinta; iyo
   (x) Inuu ku sunto dakhliga hay'adda uu ku soo xarooday, isagoo isticmaalaya Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), si loo fududeeyo ururinta dakhliga, lana cadeeyo meesha uu ka soo xarooday dakhligaan, si kor loogu qaado hufnaanta iyo isla-xisaabtanka.

Qodobka 9aad:
U kala Wareejinta Hanti Dan Guud ama Agabka Laba Hay'ad Dawladeed

1. Mar kasta oo la kala wareejinayo hanti dan-guud ama agab Dawladeed waa in ay:

   (b) Hay'ad Dawladeed ka codsata Waaxda Hantida Qaranka ama ay wareejintu iskeed ay u bilawdo Waaxda Hantida Qaranka;

   (t) Waa in codsiga kor lagu xusay loo gudbiyaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda si uu faallo iyo talo uga bixiyo; iyo

   (j) Waa in loo gudbiyaa Wasiirka si uu u ansixiyo codsiga oo ay ku lifaaqanyihiin talada Waaxda Hantida Qaranka iyo Agaasimaha Guud.

2. Waaxda Hantida Qaranka ayaa hanti danta-guud u kala wareejin karta hay'addo Dawladeed iyadoo cuskanaysa sababaha soo socda:

   (b) Baahida ay hantida u qabto hay'adda Dawladeed ee hantida loo wareejinayo iyo shaqada ay dadwaynaha ugu qabanayso;

   (t) Hay'adda Dawladeed ee hantida laga wareejinayo oo aan u hoggaansanayn Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, xeer-nidaamiyaashiisa iyo hagayaashiisa ku aaddan maareynta hantida danta guud.

   (j) hay'adaha Dawladeed ee hantida loo kala wareejinayo oo la yimaada heshiis wadajir ah.

3. Waaxda Hantida Qaranku waa in xogta hantida kala wareejinta la ansixiyay gelisaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) markay hesho warbixinta qiimeynta saxda ah ee xaaladda hantidu ku sugan tahay iyo midda kala wareejinta hantida.

4. Iyadoo mar kasta loo hoggaansamaayo Xeerka Qoondada Miisaaniyadda Qaranka, Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo xeer-nidaamiyaashiisa, qarashaadka miisaaniyadeed ee loo qoondeeyay hantida la wareejiyay waa in lala wareejiyo isla hantida.

Qodobka 10aad:
Burburinta Agabka Dawladda

1. Agabka Dawladda waxaa la burburin karaa oo keliya haddii:

   (b) Aan loo baahnayn in adeeg loogu sii qabto bulshada ama danta-guud;

   (t) Ay noqdeen wax'aan la adeegsan karin (unserviceable); iyo (j) Uu

   dhamaaday muddadii waxtarka uu lahaa.

2. Agabka Dawladda waxaa lagu khaarajin karaa:

   (b) In la iibiyo, haddii agabka aan loo sii baahnayn isticmaalkiisa; iyo

   (t) In la burburiyo, haddii aqabku aanu laheyn wax rajo ah oo lagu iibin karo ama lagu wareejin karo.

3. Waaxda Hantida Qaranku waa inay usoo gudbisaa codsiga burburinta Wasiirka si uu ansixiyo, marka la dhammeeyo hawsha khaarajinta, agabkuna ka baxo gacanta Dawladda, Waaxda Hantida Qaranku waa inay agabka la burburiyey ku wargelisaa Xisaabiyaha Guud iyo Hanti-dhoowraha Guud ee Qaranka si uu uga saaro Diiwaanka Hantida Dawladda.

4. Ka hor inta aan la iibin agab Dawladdeed, waa in dib-u-qiimeeyn lagu sameeyaa agabka, si loo dejiyo qiimaha ugu yar ee lagu shaacin karo iibintiisa si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka. Hay'adda Dawladeed ee iska iibinaysa agabka waa in ay qiimaha agabka ee ka dhasho natiijada tartanka ama gorgortanka ka diiwan-gelisa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) ka dib marka ay ogolaanshaha ka hesho Waaxda Hantida Qaranka.

5. Marka la dhammeeyo burburinta agabka ee loo maray nidaamka iibinta, Hay'adda Dawladdu waa inay heshiiska lagu burburiyey agabka ka diiwaan gelisaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), ka dibna waa in Agaasinka Dakhligu soo saaraa qaansheegta dakhli ururinta kaas oo lagu qaadayo dakhliga ka soo xarooday iibka agabka.

6. Dhammaan lacagaha ka soo xarooda iibka waa in lagu shubaa Xisaabta Khasnadda Mideysan ee Qaranka iyadoo caddaynta lacag bixintana loo gudbinaayo Xisaabiyaha Guud si uu rasiidka lacag qabashada uga dhex ansixiyo Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

7. Agab Dawladeed ee kasta oo duugow loo diwaan-galiyey waa in la burburiyo si waafaqsan habraacyada shuruucda iyo xeer-nidaamiyashu dhigayan.

8. Agab kasta oo Dawladded oo la burburiyey waa in si waafaqsan Qodobka kan ku xiga, laga tirtiraa Diiwaanka Hantida Qaranka, laga saaraa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) kaddib marka oggolaansho laga helo Waaxda Hantida Qaranka iyo Xisaabiyaha Guud.

Qodobka 11aad:
Ka tirtirida Agabka La-burburiyay Diiwaanka Hantida Qaranka

1. Sarkaalka idman ee hay'adda agabka burburisay, ayaa codsiga ka tirtirida agabka la burburiyay Diiwaanka Hantida Qaranka usoo gudbinayo Waaxda Hantida Qaranka, Xisaabiyaha Guud iyo Hanti Dhoowraha Guud ee Qaranka marka:

   (b) Agabka Dawladdu uu si buuxda u qiima beelo, la xooro ama uu hawl-gabo, balse jiritaankiisu sii muuqdo.

   (t) Agabka Dawladda loo burburiyey si waafaqsan habraaca ku xusan Qodobka kore.

   (j) Hay'adda Dawladda ama Waaxda Hantida Qaranku ay xaqiijiyaan, warbixinna ku sheegaan in agabkaas lumay.

2. Haddii lagu ogaado baarista in lumitaanka ku yimid agabka uu sababay fal uu ula kac ah ee uu sameeyay sarkaalka mas'uulka ka ah, waxaa warbixinta baarista loo gudbinayaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud si uu dacwad uga oogo Maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 12aad:
Xisaabinta iyo Ka-warbixinta

1. Xisaabiyaha Guud wuxuu soo saarayaa tilmaamo lagu qeexayo xeerarka xisaabinta, mabaadi'da iyo hababka ay Hay'adaha Dawladdu u xisaabinayaan qiimaha, qiimo- dhaca iyo khasaaraha ku yimaada hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

2. Hay'adda Dawladdu waa inay warbixin sannadeedka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda gelisaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) si nidaamku uu u soo saaro warbixin sannadeed dhamaystiran ee dhammaan hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

3. Warbixin sannadeedka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda waa in lala wadaagaa:

   (b) Wasiirka, si uu u guto waajibaadkiisa ku aaddan maareynta maaliyadda guud;

   (t) Waaxda Hantida Qaranka si ay u isticmaalaan marka la fulinayo baaritannada iyo kormeerada xaqiijinta bad-qabka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (j) Xisaabiyaha Guud si uu ugu adeegsado diyaarinta warbixinta xisaab-xirka (balance sheet) Dawladda.

   (x) Hanti-dhawrka Guud si uu ugu adeegsado baaritaannada hanti-dhawrista.

   (kh) Waaxda Miisaaniyadda si ay ugu adeegsado diyaarinta soo-jeedinta miisaaniyadda.

4. Warbixin sanadeedka dhamaystiran ee hantida danta-guud iyo agabka Dawladda (consolidated annual report) waa in lala wadaaga Labada Aqal ee Baarlamaanka JFS, isla marka Hanti-dhawrka Guud la wadaago Labada Aqal ee Baarlamaanka warbixinta xisaab-xirka ee baarista soo martay.

5. Waa in Waaxda Hantida Qaranka ay ku daabacdo mareegta (website) Wasaaradda, 15 (shan iyo toban) maalmood ka dib marka warbixinta lala wadaago Baarlamaanka, warbixin kooban oo laga soo saaray warbixin sanadeedka dhamaystiran ee ku xusan faqradda (4) ee qodobkan , si dadweynuhu u aqriyaan.

6. Hay'adda Dawladdu waa in ay warbixinta ku saabsan wixii isbeddel, burbur ama khasaare ah ee soo gaara hantida danta-guud ama agabka Dawladda oo ay mas'uulka ka tahay la wadaagtaa Waaxda Hantida Qaranka iyo Xisaabiyaha Guud,

   30 (sodon) maalmood gudahooda ka dib marka uu dhaco falka saameeyay hantida ama agabka.

7. Waaxda Hantida Qaranku waa in ay ogeysiisaa:

   (b) Xisaabiyaha Guud haddii ay jirto wax shuruud ah oo looga baahan in lala kulmo marka laga tirtiraayo agab la burburiyay Diiwaanka Hantida Qaranka.

   (t) Wasiirka haddii ay jirto codsi ku saabsan wareejin hanti dan-guud ama burburin agab Dawladeed.

   (j) Hanti-dhawrka Guud haddii ay jirto baahi loo qabo baaris hanti-dhawris oo ku saabsan hanti dan-guud ama agab Dawladdeed.

   (x) Xeer-ilaaliyaha Guud, haddii ay jirto dembi laga galay ama ka dhan ah hanti danguud ama agab Dawladdeed.

8. Waaxda Hantida Qaranku waxa ay waqti kasta codsan kartaa in ay xaqiijiso xaalada uu ku sugan yahay hanti dan-guud ama agab Dawladeed ama kormeerto hanti danguud ama agab Dawladeed. Waaxdu waxay sidoo kale u sameyn kartaa hawlaha xaqiijinta iyo kormeerka si lama filaan ah.

QEYBTA AFARAAD

MAAREYNTA AGABKA DAWLADDA

Qodobka 13aad:
Maareynta Gaarka u ah Agabka Dawladda

1. Wasiirka ayaa soo saaraya tilmaamo ku socda hay'addaha Dawladda oo ku aadan soo saarista habraacyo gudahooda ku eg oo ay ku maaraynayaan agabka Dawladda oo ay maamulaan. Tilmamaahan waa in ugu yaraan ay ka koobnaadaan:

   (b) Nidaamka diyaarinta qorshaha wax iibsiga ee sanadlaha ah si looga hortago in agab xad-dhaaf ah lasoo iibsado.

   (t) Habka dayactirka iyo keydinta agabka.

   (j) Habka loo maraayo qiimeynta agab ay soo iibsadeen, tirinta agabka kaydka ah, la socodka agabka iyo kaydinta diwaan sax ah ee agabka.

   (x) Habka la maraayo marka la wareejinaayo, la burburinaayo, ama laga tirtiraayo diiwaanka agab.

   (kh) Nidaamyada ilaalinta agabka iyo tallaabooyinka looga hortagayo xatooyada, khiyaanada, iyo isticmaalka qaldan.

   (r) Habka loo dhaqan-gelinayo xeerarka, habraacyada iyo tallabooyinka ku aadan maareynta agabka.

2. Hay'adaha Dawladda waa in ay Waaxda Hantida Qaranka u soo gudbiyaan habraacyo gudahooda ay u dajisteen ee lagu maareynayo agabka. Sidoo kale dukumeentiyadan waa in lala wadaaga Hanti-dhawrka Gudaha, iyo Hanti-dhawrka Guud marka ay codsadaan.

3. Maamulida agabka waa in loo raaco habka kala soocida ee uu dajiyay Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka, xeer-nidaamiyeyaashiisa ama midka ku cad Nidaam- xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

Qodobka 14aad:
Soo Iibsiga Agabka

1. Sarkaalka idman ee Hay'ad Dawladeed waa inuu ku xussaa soo jeedinta miisaaniyadda ee hay'addiisa kharashka ku baxaya soo iibsiga agabka.

2. Ka hor inta aan la soo gudbin khiyaasta kharashka loo baahan yahay in lagu soo iibsado agab, Sarkaalka idman ee Hay'ada Dawladeed waa in uu hubiyaa:

   (b) In qarashka la khiyaasay in loo baahan yahay si loogu soo iibiyo agab uu waafaqsan yahay qabyo qoraalka qorshaha iibka sannadlaha ah. iyo

   (t) In iyadoo la raacayo habraaca gudaha ee Hay'addu jideeysatay si loogu maareeyo agabka si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobka 13^{aad}, agabka yaala, walibana uu

   qiimeeya agabka loo baahanyahay iyo kuwa daruuriga ah.

3. Hay'addaha Dawladda waa in ay usoo iibsadaan agabka si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka, xeer-nidaamiyaashiisa iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo xeer-nidaamiyaashiisa.

4. Dhammaan agabka ay soo iibsato hay'add Dawladeed waa inuu hubiyaa sarkaal leh khibradda loo baahan yahay, isagoo:

   (b) Caddaynaya in agabku waafaqsan yahay dalabka iibka, qaan-sheegta, iyo dukumentiyada kale ee khuseeya. iyo

   (t) Xogta agabka lasoo iibiyay gelinaaya Diiwaanka Hantida Qaranka.

5. Marka gacanta lagu dhigo oo la diwaan galiyo dhammaan agabyada la soo gaarsiiyo hay'ad Dawladeed, Sarkaalka Idman waa in uu macluumaadka la wadaagaa Waaxda Hantida Qaranka, walibana:

   (b) Xaqiijiya nooca agabka isaga oo isla eegaya dalabka agabka, qaan-sheegta, iyo dukumentiyada kale ee khuseeya si loo hubiyo daahfurnaanta iyo saxsanaanta agabka.

   (t) Si degdeg ah u geliyo xogta agabka lasoo iibiyay Diiwaanka Hantida Qaranka isagoo kaydinaaya diiwaan dhammaystiran ee dhammaan agabka hay'adda Dawladda.

   (j) Ka hela oggolaansho Waaxda Hantida Qaranka ee la xariirta codsiyada diiwaangelinta agabka cusub.

6. Sida ku cad Qodobka 13aad, Wasiirka ayaa soo saaraya tilmaamo ku socda Hay'addaha Dawladda oo ku aadan soo sarista habraacyo gudahooda ku eg oo lagu maareynayo agabkooda. Tilmaamahaan waa inay dhiiri-galiyaan hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee maamulka maaliyadda guud iyagoo:

   (b) Dhiiri-gelinaya isticmaalka hababka maareynta agabka ee daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka ku dhisan.

   (t) Fududeynaya samaynta habab cadcad ee ku aaddan xakamaynta agabka iyo kasoo warbixinta agabka.

   (j) Xaqiijinaya fulinta kormeerka iyo la socodka ku habboon tirada, isticmaalka iyo khaarajinta agabka.

   (x) Dhiiri-gelinaya wada-shaqaynta iyo macluumaad wadaagista Hay'adaha Dawladda dhexdooda si kor loogu qaado tayada nidaamyada maareynta agabka Dawladda.

Qodobka 15aad:
Kaydinta Agabka Dawladda

1. Sarkaalka idman ee Hay'adda waa in uu dhisaa, walibana joogteeya shaqada xarun kayd ah oo buuxin karta shuruudaha soo socda:

   (b) Xarunta kaydka ah waa in jawi ahaan ahaataa mid ku habboon kuna filan in lagu kaydiyo agabka Dawladda iyadoo xarunta kaydka ahi ka jawaabi karto baahida agabka lagu kaydinayo.

(t) Xarunta kaydka waa inay lahaataa quful iyo nidaam sugan oo ilaalinaya bad- qabka agabka Dawladda.

(j) Xarunta kaydka waa inay lahaataa qof maamula si uu u xakameeyo una maareeyo agabka Dawladda si waafaqsan habraacyada gudaha hay'adda ee ku aaddan maareynta agabka, gaar ahaan la wareegista agabka cusub, dayactirka, qoondaynta, burburinta , iyo ka tirtirida diiwaanka.

(x) Xarunta kaydka waa inay lahaata diiwaanka kaydka si loogu diiwaan-geliyo sifooyinka muuqda iyo xogaha kale ee agabka iyo dayactirka si waafaqsan habraacyada gudaha hay'adda ee ku aaddan maareynta agabka.

2. Habraacyada gudaha hay'adda ee ku aaddan maareynta agabka waa inay ku jiraan siyaasado iyo hagayaal tilmaamaya sida agabka loogu kala qoondeynayo waaxyaha, xafiisyada iyo saraakiisha hay'adda iyadoo la hubinayo in:

(b) Agabka lagu bixiyo nidaam ku saleysan baahida jirta iyo in aan xaddi aan loo baahnayn aan la bixin.

(t) Qaataha agabku uu mas'uul ka yahay ilaalinta agabka lagalana xisaabtamayo wixii waxyeelo ah ama khasaare ah ee agab kusoo gaarta u hoggaansami la'aanta habraacyada maareynta agabka Dawladda ama dayacaad.

3. Sarkaalka idman ee hay'adda waa inuu u diyaariyaa inay arki karaan xarunta kaydka, diiwaanka hantida, diiwaanka kaydka, nidaamka maaraynta agabka, iyo agabka Dawladda, Xisaabiyaha Guud, Wasaaradda Maaliyadda, Hanti-dhawrka Gudaha, ama Hanti-dhawraha Guud marka ay ka codsadaan in ay arkaan.

Qodobka 16aad:
Habka Xaqiijinta iyo Hubinta Agabka

1. Sarkaal ka socda Waaxda Hantida Qaranka waa inuu ugu yaraan hal mar sannad kasta xaqiijiyaa agabka Dawladda, ama mar kasta oo ay xaalad keento in la xaqiiyo taas oo ku timid awaamiir kasoo baxday xafiiska Wasiirka. Ujeedada laga leeyahay xaqiijinta agabka waa in la hubiyo sidda loogu hoggaansan yahay dhammaan sharciyada, xeer-nidaamyada, iyo hab-raacyada lagu maamulayo maaraynta agabka Dawladda. Xaqiijintan waxaa ka mid ah in la xaqiijiyo jiritaanka agabka, lahaanshaha, xaalada uu ku sugan yahay, halka ay taalo, qiimaha ay taagan tahay, xadiga, heerka dayactirka, sida loo isticmaalo, haddi wax wareejin jirto iyo haddii hantida ay tahay mid la burburinayo oo duugawday.

2. Sarkaalka idman ee Hay'adda Dawladda waa in uu habraacyada xaqiijinta sameeyaa saddexdii biloodba mar, si loo adkeeyo habraacyada gudaha ee maareynta hantida.

Qodobka 17aad:
Maareynta Agabka Dawladda

1. Si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Iibka ee Qaranka iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa, Wasiirku wuxuu soo saaraya Hagaha Maareynta

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 24/08/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 138

XEERKA: QARAARKA XOOJINTA U-HOGAANSANAANTA SHARCIYADA IYO XEERARKA DAKHLIGA

XRW - BIXIT
29 AUG 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) & (e) iyo Qodobka 100aad Farqadaha (a) & (d) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee KMG ah;

Markuu arkay: Warbixinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ee ku saabsan caqabadaha kala duwan ee saameeynaya ururinta dakhliga Dawladda, oo ay ku jiraan noocyada kala duwan ee canshuuraha;

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW0044.08.23** ee **24/08/2023** kuna saabsan ansixinta Qaraarka Xoojinta U-hogaansanaanta Sharciyada iyo Xeerarka Dakhliga, oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey;

Markuu garwaaqsaday: Baahida degdegga ah ee loo qabo dardargelinta iyo kobcinta dakhliga gudaha si loo gaaro isku filnaansho Maaliyadeed;

Wuxuu Xeeriyay:

Qodobka 1aad
Go'aanka Golle

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW0044.08.23** ee **24/08/2023**, kuna saabsan ansixinta Qaraarka Xoojinta U-hogaansanaanta Sharciyada iyo Xeerarka Dakhliga, oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2aad
Qaadashada Shahaadada Canshuur Bixinta

1. Golaha Wasiirrada XFS waxay bogaadinayaan shacabka Soomaaliyeed ee canshuur bixiyaha ah oo laf-dhabar u ah Dawlad dhiska. Xilligan xasaasiga ah ee lagu jiro dib udhiska dhaqaalaha dalka iyo la dagaallanka iyo cirib tirka khawaarijta, waxa lagama maarmaan ah in la dardargeliyo dedaalada dakhli ururinta si loo bixiyo adeegyada aas-aasiga ah ee muwaadiniinta Soomaaliyeed ka sugayaan Dawladda.

2. Dhammaan Wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda ee bixiya adeegyada Dawliga ah sida shatiyada, qandarayaasyada, cashuurta adeegyada la talinta (consulting and professional fees), waxa la farayaa in ay ku xiraan shahaadada canshuur bixinta (SHCN/TCC) shirkadaha iyo hay'adaha loo fidinayo adeegyada Dawliga ah.

3. Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladdu waa in ay hubiyaan bixinta cashuurta ku waajibtay khubarada iyo lataliyaasha la shaqeeya ee ay musharkooda bixiyaan Hay'adaha Caalamiga, kaas oo aan soomarin Khasnada Dhexe ee Midaysan ee Dawladda.

4. Dhammaan hay'adaha Dawladda ee bixiya shatiyada iyo ruqsadaha noocyadooda kala duwan waxa la farayaa in ay fududeeyaan xogta ay Wasaaradda Maaliyaddu uga baahan tahay si looga dhigo hab dhigitaal ah kuna xiran Nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) marka ay bixinayaan shatiyada iyo ruqsadaha.

Qodobka 3aad
Dhaqangalka

Dhammaan hay'adaha Dawladdu waa in ay xaqiijiyaan dhaqalgalinta Qaraarkan muddo **30 maalmood** gudahood ah.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda XFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN-071-23
TAARIIKH : 06-05-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guute
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/174/07/2023

XRW - BIXIT
16 JUL 2023
OPM - EXIT

Taariikh: 13/07/2023

Ku: Dhammaan Xubnaha hoos ku xusan =Muqdisho
Og: Dhammaan Golaha Wasiirrada =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

UJEEDDO: MAGACAABIDDA MAAMULKA SARE IYO XUBNAHA HAY'ADDA KORONTADA QARANKA.

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (g) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Sharciga Korontada **Sharci Lr 002** ee soo baxay **08 Maarso 2023**, Qodobkiisa 20aad oo tilmaamaya Magacaabidda xubnaha iyo Maamulka Sare ee Hay'adda.

Markuu arkay: Taariikh nololeedka, Aqoonta iyo waayo Aragnimada ay leeyihiin.

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **WTKHB/XW/057/23** kuna taariikheysan **13/07/2023** ee soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.38.07.23** oo soo baxay **13/07/2023,** kuna saabsan Magacaabidda Maamulka Sare iyo xubnaha **Hay'adda Korontada Qaranka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leedahay dardargelinta howlaha Hay'adda.

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.38.07.23** ee soo baxay **13/07/2023,** kuna saabsan Magacaabidda Maamulka Sare iyo xubnaha **Hay'adda Korontada Qaranka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2aad

Magacaabid

waxaa la magacaabay xubnaha hoos ku xusan

Lr.	Magaca	Xilka
1	Cabdulaahi Axmed Dayib	Maareeya Guud
2	Maxamed Ibraahim Muuse	Maareeye ku-xigeen
3	Cabdifitaax Abshir Ibraahim	Xubin
4	Liibaan Cali Sahal	Xubin
5	Khaalid Saalax Maxamuud	Xubin
6	Maxamed Yuusuf Diiriye	Xubin
7	Cabdi Nuur Muuse	Xubin
8	Intisaar Ibraahin Axmed Caabi	Xubin
9	Cabdinaasir Cali Cabdi Xuseen	Xubin

Qodobka 3aad

Magacaabidan waxa ay dhaqan-galaysaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN-069-23
TAARIIKH : 06-09-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutele
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.140

Tariikh: 12/10/2023

XEERKA: SIYAASADDA DHAQANKA EE SOOMAALIYA

XRW - BIXIT
22 OCT 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.49.10.23 ee 12/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leeyahay Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.49.10.23** ee **12/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya, waxaa hir-gelintiisa u xilsaaran Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska.


Qodobka 3aad

Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-114-23
TAARIIKH: 11-12-2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Bare
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS


MINISTRY OF INFORMATION, CULTURE & TOURISM
MoICT-SOMALIA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA & DALXIISKA
SIYAASADDA QARAN EE DHAQANKA
Sept - 2023
uqdisho - Soomaaliya

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA



WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA IYO DALXIISKA.

Jidka Villa Somalia, Warta Nabadda District, Mogadishu-Somalia.
Website-ka: http://moi.gov.so/

2

Siyaasadda Qaran ee Dhaqanka Soomaaliyeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka & Dalxiiska



Soo Jeedinta Wasiirka Warfaafinta Dhaqanka & Dalxiiska

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

DAA'UUD

AWEYS

JAAMAC

WASIIRKA WARFAAFINTA DHAQANKA & DALXIISKA

HORDHAC

Soomaaliya waxay leedahay dhaqan soo jireen ah oo ka turjumaya heerarka kala duwan ee nolosha dadka Soomaaliyeed. Dhaqanka Soomaaliyeed, wuxuu salka ku hayaa nolosha dadka reer guuraaga ah, beeralayda iyo dadka kuluumaysatada ah. Maadaama inta badan dadka Soomaaliyeed ay ahaayeen kuwa aan wax qorin, ayaa Soomaalidu waxay dhaqan u lahayd inay suugaanta noocyadeeda kala duwan isugu gudbiso fariimaha, iyagoo isku xog waraysan jirey, iskuna maaweelin jirey Gabayada, Geeraarada, Guurowga, Heesaha, Sayliciga, Buraanburka, Jiiftada, Shiribka, Dhaantada, Wilisiqo, Kabeebey, Saarka, Beereey, Jaandheer, Sharax, IWM.

Bulshadda Soomaaliyeed waxay leeyihin dhaqan soojireen ah oo suuban diin iyo hab-dhaqan sugan oo ay ku soo dhaqmayeen kafac kafac, Xoriyadii ay Soomaaliya heshay **1960** ka dib waxaa jiray kooxo ka shaqeeya dhaqanka iyo suugaanta, goobo dhaqan, Kooxo abaabulan oo fanka iyo suugaanta, gabay-yahano iwm.

Sidoo kale waxaa bud-dhig u ah shareecadda islaamka iyo dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed. Intaa waxaa dheer, Hay'adda u qaabilsan Qaramadda middoobay Waxbarashadda, sayniska iyo dhaqanka ee **UNESCO (2002)** waxay ku qeexday dhaqanka inuu yahay "xeerka gaarka ah muuqaalada ruuxiga ah, maadiga, garaadka shucuubeed ee bulshada ama koox bulshada ka mid ah, ama ay bulsho ka kooban tahay, sida fanka iyo suugaanta, qaab nololeedka; habka wada noolaanshaha, nidaamka qiimaha dhaqan bulsho, caadooyinka iyo caqiidada." Dhaqanku waa fikradaha, caadooyinka iyo hab-dhaqanka bulshadeed, calaamadaha aqoonsiga bulsho qiyamkooda, luqaddooda, qaab nololeedkooda, caadooyinkooda, fankooda iyo aqoontooda dhaqanka.

Dhaqanka Soomaalidu waa mid soo jireen ahaa kaasi oo jiilal badan iska dhaxleen. Sida taariikhyahanadu sheegeen wuxuu asal ahaan ka sameeysmay nolosha maalinle iyo xiriirka bulshada Soomaalidu la sameeysay bulshooyinka deriska ah iyo xiriirka ganacsi iyo waxbarasho ee deegaanada fogfog.

Soomaalidu waxay lahayd Hu', Hoy iyo Agab dhaqameed u gaara ah. Ragu waxay xiran jireen laba go'oo cadcad oo kala ahaa mid la huwado iyo mid la guntado. Waxaa kaloo ay xiran jireen Kiishad iyo Tooreey, iyagoo gacantana ku qabsan jiray Ul dheer, gaashaan iyo Waran. Waxay la bixi jireen timo waaweyn, iyagoo timaha suran jiray firin, gacantana ku qaadan jiray Barshin. Waxay xiran jireen kabo laga sameeyay hargaha xoolaha.

Dhaqanka dhar xirashada ee dumarkeenu, wuxuu ahaa mid iyaga u gaar ah, waxay xiran jireen Gareys ama Guntiino, oo ay la socdaan kuulo waaweyn oo meelaha qaar looga yaqaano Cunnaabi oo qoorta ay suran jireen. Timaha way tidcan jireen.

Agabka Dhaqanka Soomaaliyeed ee la xusi karo, waxaa ka mid ahaa: Haan, Dhiil, Haruub, Aqal Soomaali, Mudul ama Buul, Dhig iyo lool, Hangool Saab, Kal, Mooye, Barshin, Xeero iyo Fandhaal IWM.

Dhaqanka Soomaalidu waa mid marti-soorka ku wanaagsanaa, oo marka qoyska baadiyaha ay socoto u soo martiyaan, maadaama Soomaalidu reer guuraa ahayd, waxaa lagu soori jiray in xoolo loo qalo, isla markaana cunto dhaqameed loo diyaariyo 'cad iyo caano' iyo noocyada kale ee cuntada Soomaalida sida: Soor ama Shuuro, Canbuulo IWM.

Hogaanka Soomaalida, oo odayaasha dhaqanku ay hormuud ka ahaayeen, waxay geedaha hoostooda ku xalin jireen khilaafaadka bulshada ama qoysaska Soomaaliyeed, iyagoo caan ku ahaa in xal kama dambeys ah oo lagu wada qanco gaari jiray.

Dhaqanka ummadda Soomaaliyeed, waa summad ka gaar yeesha ama ka soocda ummadaha kale ee dunida, waana mid bulshadiisa qiimo weyn ugu fadhiya, oo mideeya. wuxuu kaloo abuurayaa faham caalami ah in bulshadan laga helo, oo dhaqankoodu noqdo mid ka dhex muuqda ummadaha kale.

Taariikh ahaan dhaqanka soomaaliyeed wixii ka danbeeyey burburtay dawladii soomaaliyeed ee dhexe 1991 waxaa meesha ka baxay ilaalinta iyo horumarinta dhaqanka soomaaliyeed, waxaana soo batay kooxo dhaqan-dooris ah oo soo waariday dhaqamo shisheeye.

Burburkii ka dib dawladihii isxigxigay ee dalka soo maray maysan u suuragalin in ay diyaariyaan siyaasad dhaqan oo lagu hago dhaqanka soomaaliyeed.

Hadaba, siyaasaddan waxay hiigsanaysaa in dowladda iyo bulshada Soomaaliyeed ay si wada-jir ah uga hawl-galaan sidii loo soo noolayn lahaa Hiddihii iyo Dhaqankii hore ee Soomaaliyeed, isla markaana loo diyaarin lahaa siyaasad Qaran oo la jaan-qaadi karta siyaasadaha dhaqan ee dunida.

Sidaa darteed, waxay Wasaarada Warfaafinta Dhaqanka iyo Dalxiisku ay halkan ku soo gudbinaysaa siyaasadda Dhaqanka iyo Hiddaha Soomaaliyeed:Qeexida Dhaqanka Soomaaliyeed.

Hadaba, Wasaaradda oo ka duulaysa waajibaadkeeda shaqo ee loo xilsaaray waxay ka shaqaynaysaa horumarinta iyo hagaajinta sharuucda iyo siyaasadda iyo istaraatijiyadda lagu dhaqayo arimaha Dhaqanka oo lafdhabar u ah Ummadda Soomaaliyeed waxayna diyaarisay siyaasadda dhaqanka.

DEJINTA SIYAASADDA QARAN EE DHAQANKA

Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka Iyo Dalxiiska JFS oo ka duulaysa Horumarinta Iyo xoojinta Dhaqanka Soomaaliyeed Sida uu qabo dastuurka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya qodobkiisa 31aad ee dastuurka, farqadihiisa 1,2,3 & 4 oo ka hadlaya dhaqanka iyo afka waxa isku hawshay diyaarinta iyo hirgalinta siyaasadda Dhaqanka ee Qaranka mudada udhaxaysa 2023 ilaa 2028.

UJEEDOOYINKA SIYAASADA DHAQANKA:

1. Soo noolaynta Dhaqankii Soomaaliyeed.
2. Hirgelinta siyaasadda dhaqanka Soomaaliyeed.
3. Dajinta sharciyadda iyo qorshayaasha lagu hormarinayo dhaqanka Soomaaliyeed.
4. Ku wacyigalinta bulshada muhiimada uu leeyahay dhaqanku.
5. Illaalinta anshaxa dhaqan ee bulshada.
6. Ku ababinta ubadka dhaqanka wanaagsan.
7. Dhiirigelinta, tabo-barida iyo aqoon kordhinta hal-abuurayaasha far-shaxanka iyo fanka.
8. Ciribtirka Dhaqamada gurracan.

YOOLKA SIYAASADDA QARAN EE DHAQANKA 2023 – 2028:

Yoolka siyaasaddan waa in dowladda iyo bulshada Soomaaliyeed ay si wada-jir ah uga hawl-galaan sidii loo soo noolayn lahaa Hiddihii iyo Dhaqankii Soomaaliyeed, isla markaana loo diyaarin lahaa siyaasad Qaran oo la jaan-qaadi karta siyaasadaha dhaqan ee dunida.

HIGSIGA, SIYAASADDA DHAQANKA SOOMAALIYEED.

Sida hoos ku xusan waa nuxurka la filayo in bulshada Soomaaliyeed iyo kooxaha dhaqanka gaaraan marka la fuliyo Siyaasada Qaranka ee Dhaqanka:

"in la helo siyaasad dhaqan oo ka turjumaysa dhaqanka iyo anshaxa suuban ee Soomaaliyeed waa hiigsiga siyaasadan, sidoo kale waxaa mudnaan xoogan leh soo noolaynta xarumaha dhaqanka ee Dalka iyo tababarida kooxaha dhaqanka si loo helo jiil da'yar oo buuxiya kana qaybqaata soo noolaynta

dhaqanka Soomaaliyeed ee mudooyinkan danbe aan helin horumarin".

MABAADII'DA HAGAYSA SIYAASADDA:

Mabaadiida soo socota waxa ay muujinayaan qiyamka asaasiga ah ee ay ka duulayaan ujeedooyinka siyaasada dhaqanka iyo talaabooyinka lama huranka ah. Waxaana waajib ah in lagu dhaqmo, la ilaaliyo oo loo hogaansanaado mabaa'didaasi si looga dhabeeyo hiigsiga Siyaasada Qaranka ee Dhaqanka. Waxayna mabaadi'daasi yihiin:

- Anshaxa suuban (Caqiidada islaamka).
- Madaxbanaanida Soomaliya (dawladnimada).
- Ixtiraamka sharafta, dhaqanka Soomaaliyeed.
- Maamul wanaagga iyo xurmaynta xaquuqda aadanaha.
- Dhiirigalinta iyo awood-siinta kooxaha dhaqanka Soomaaliyeed.
- Iskaashi iyo ka qaybgal balaaran oo ku aadan horumarinta arimaha dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed.

HIRGALINTA SIYAASADDA DHAQANKA.

- Waxaa la qeexayaa dhaqanka Soomaaliyeed.
- Waxaa la unkayaa summadda Dhaqanka iyo Hiddaha Soomaaliyeed.
- Waxaa la tirokoobayaa lana diiwaangelinayaa xarumaha Dhaqanka ee dalka oo dhan.
- Waxaa la yagleelayaa xarunta dhexe ee Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyeed.
- Waxaa dib loo dhisayaa Xarumaha Hidaha iyo Dhaqanka dalka.
- Waxaa dib loo soo celinayaa agabkii Qaran ee Dhaqanka.
- Waxaa bulshada lagu wacyigelinayaa muhiimadda dib u soo nooleynta iyo daryeelka dhaqankooda.
- Waxaa la dhisayaa Guddiga Qaran ee Hidaha iyo Dhaqanka.
- Waxaa Manhajka waxbarashada dalka lagu darayaa barashada Hiddaha iyo Dhaqanka.
- Waxaa dalka oo dhan laga hirgelinayaa carwooyin lagu soo bandhigo Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyeed.
- Waxaa la qabanayaa munaasabado lagu soo bandhigo Dhaqanka iyo Hiddaha Soomaaliyeed.
- Waxaa la isku xirayaa hey'adaha dhaqanka ee dalka iyo kuwa caalamka.

GEEDKA IYO GARTA:

Geedku waxa uu mar ahaa goob-garsoor(maxkamad) marna waxa uu ahaa gole wadatashi. In garta lagu naqo geed weyn oo hadhac ah hoostiisu, waxa ay ka mid ahayd hab-maamuuska garta gaarka u ah

iyo tiirarka udub-dhexaadka ah ee aan la hilmaami jirin. Si fiican ayaa loo gogli jiray, looguna astaynjiray xeerbeegtida iyo garramayaasha labadaba. Waayo inta badan garta fadhi iyo dooyaysi ayaa lagu naqi jiray, ee taagnida iyo galluubnaantu sax ma ahayn. Sida badanna geedka garta cidna lagama celin jirin oo waxa uu ahaa madal furan oo ay dhagaysigeeda dadku ka qaybgli karaan. Geedka waxa ka garniqi jirray xidaar xeer aqoon ah, oo xirib iyo xilkasnimo lagu majeerto, xurmana ku dhex leh golayaasha lagu galgaal-bixiyo doodaha bulshada ka dhex aloosan.

Anshaxa iyo asluubku waxa uu ahaa in aan hadalka la iska dhabqin, jaarriga iyo jaafaajiriqana laga yareeyo geedka garta. Haddii qof hadal wadana aan laga hororsan ama laga rabshin, oo waxa lagu maahmaahi jiray " hilbo ayaa la wadaagaa hadalse lama wadaago". Kolka ay labada qof ee garramayaa hadlayaan waxa hadalka ka guri jiray nin loo yiqiinnay "wargure". Warguruhu waxa uu adeegsanayaa erayo koobkooban oo muujinaya dhugasho iyo dhegraaricin. Marka ay joogto garta iyo geedka, ragga waxa loo qaybin jiray afar;

1. Nin kasa oo kara
2. Nin kasa oon Karin
3. Nimaan kasin oo kara
4. Nimaan kasin oon Karin.

DHAQANKA IYO HORUMARKA WAARA.

Horumarka waara waxa loola jeedaa mid daboolaya baahiyaha jiilasha soo koraya ee bulsho Awood buuxdana siinaya jiilalka mustaqbalka si ay u gaadhaan rabitaankooda. Dhaqanku waa qayb ka mid ah horumar waara, kor u qaadida kala duwanaanshiyaha ku qotoma horumar waara oo laga gaaro fahanka dhaqanka bulsho iyada oo loo marayo wada hadal aqoon iswaydaarsi ku qotoma caadooyinka bulshadda Soomaaliyeed. fayo-qabka guud ee bulshooyinka, isku-kalsoonaanta shakhsi ahaaneed iyo tayada nolosha oo lagu xusay muhiimada uu u leeyahay awoodsiinta dadka si ay u yeeshaan lahaanshaha horumarkooda."

WARSHADAHA HAL-ABUURKA DHAQANKA.(CULTURE CREATING INDUSTRIES)

Dalku wuxuu lahaa goobo soo saara hal abuurka hidaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed oo ay ka mid ahaayeen Wakaaladda murtida iyo wacyigalinta Soomaaliyeed oo ay hoos iman jireen Hoboladda

Qaranka ee waaberi iyo goobo kale oo ka shaqeeya arimaha dhaqanka. Wakhtigan la joogo wasaaradda warfaafinta, dhaqanka iyo dalxiiska waxay dadaal ugu jirtaa soo noolaynta xarumaha dhaqanka iyo hal-abuurka Somaaliyeed oo muhiim u ah hal-abuurayaasha Soomaaliyeed waxayna hada dib u howlgalisay Wakaaladda murtida iyo wacyigalinta Soomaaliyeed(Tiyaatarka Qaranka) oo hada uu ka socdo dadaalo lagu soo noolaynayo hal-abuurka iyo dhaqanka Umadda Soomaalida.

DHAQANKA IYO DAWLADNIMADA.

Muwaadiniinta Soomaaliyeed waxay Xaq u leeyihiin in ay si xor ah u cabiraan ugana qaybqaadataan dhaqamada suuban ee bulshadda soomaaliyeed iyaga oo aan waxba u dhimayn qiyamka iyo asluubta, anshaxa, si loo dhiirigaliyo horumarinta iyo faafinta dhaqanka soomaaliyeed. Aqoonta, dhaqanka iyo anshaxa suubani waa sifo dimoqraadiya. Xoriyada dhaqanka iyo muujinta dhaqanka suuban ee bulshadda iyo xoojita dhaqan bulsho oo aan ka horimanayn qiyamka iyo sharuucda dalka waa mabaadiida dawlad wanaagga. Dawladimaddu waxay sare u qaadaa wanaagga xorriyadda lagu haysto caqiidada, aqoonta, hadalka, iyo xaqa uu qofku u leeyahay caqiidadiisa.


GUNAANAD

Ugu danbeyntii, Siyaasadan waxay sal u tahay dib u soo nooleynta Dhaqanka ummadda Soomaaliyeed, oo uu saameeyay burburkii dalka ka dhacay. Hadaba, fulinta siyaasadan waxay horseedeysaa ilaalinta Dhaqanka Soomaaliyeed. Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska waxay diyaarinaysaa Istaraatijiyad dhaqan oo lagu hirgelinayo siyaasadda dhaqanka ee kor ku xusan.

==========**DHAMAAD**==========

YAASADDA QARAN EE

DHAQANKA



Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Dalxiiska

Tariikh: 28/10/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.142

XRW - BIXIT
30 OCT 2023
OPM - EXIT

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA DHOOFKA, SHAHAADOOYINKA IYO ASTAAMAHA TAYADA.

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.51.10.23** ee **28/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Dhoofka, Shahaadooyinka Iyo Astaamaha Tayada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta Xeer-nidaamiyaha Dhoofka, Shahaadooyinka Iyo AstaamahaTayada .

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.51.10.23** ee **28/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Dhoofka, Shahaadooyinka Iyo AstaamahaTayada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-nidaamiyaha Dhoofka, Shahaadooyinka Iyo AstaamahaTayada.

Qodobka 3aad

Xeer-nidaamiyaha Dhoofka, Shahaadooyinka Iyo AstaamahaTayada waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN-115-23
TAARIIKH : 11-12-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guteh
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA

XEER-NIDAAMIYAHA
BAARITAANKA IYO XAQIIJINTA TAYO-DHAWRKA BADEECADAHA

CUTUBKA KOWAAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad
Qeexid

Haddii aan si kale loogu sheegin xeer-nidaamiyahan gudihiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid waliba yelanayaa macnaha ku horqoran:

"Xeer-nidaamiye" waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-dhawrka Badeecadaha JFS;

"Hay'adda"waxaa loola jeedaa Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

"Baarista Badeecadaha Furdooyinka" waxaa loola jeedaa xaqiijinta waafaqsanaanta Badeecadaha ee hal-beegyada tayo-dhawrka ee lagu sameeyo Dekedaha, Garoomada iyo bar-xudduudeedyada Dalka, ama xarun kasta oo kale oo ay Hay'addu oggolaato;

"Furdooyin" waxaa loola jeedaa xudduudaha Dalka laga soo galo (dhulka, cirka iyo badda);

"Badeeco"waxaa loola jeedaa shay, alaab ama wax kasta oo ugu dambeyntii noqonkara wax laga ganacsado ama la isticmaalo;

"Shahaadada fasaxa Badeecadda" waxaa loola jeedaa dukuminti ay soo saartay Hay'adda oo caddeynaya in tayada Badeecadda la soo dejiyey ay waafaqsantahay jaan-gooyada Tayo-dhawrka;

"Badeecadda Shatiga leh" waxaa loola jeedaa Badeecadda ay sida joogtada ah u qiimeyso Hay'adda, una aragto inay waafaqsantahay hal-beegyada Dalka, gobolka ama caalamiga ah ee khuseeya iyadoo la isticmaalayo hab-raac la yaqaan;

"Hal-beegyada Dalka" waxaa loola jeedaa hal-beegyada iyo jaan-gooynta uu Golaha Hay'addu shaaciyey si waafaqsan xeer-nidaamiyahan;

"Badeeco diiwaan-gashan" waxaa loola jeedaa alaabaha leh heerar joogto ah oo ku aaddan waafaqsanaanta hal-beegyada Dalkaama caalamiga ah, oo ay macquul tahay in laga reebo tijaabada/hubinta Dalka;

"Badeeco aan diiwan-gashaneyn" waxaa loola jeedaa alaabada aan lahayn xog hore oo laga tixraaco inay waafaqsan yihiin hal-beegyada tayo-dhawrka, oo ay tahay in la tijaabiyo si loo xaqiijiyo waafaqsanaanta hal-beegyada Dalka;

"Dabar" waxaa loola jeedaa xayiridda isticmaalka iyo furitaanka Badeeco inta go'aanka waafaqsanaanta hal-beegyadu kasoo baxayo;

"Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ee Xukuumadda JFS; iyo

"JFS" waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad
Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa **"Xeer-nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-dhawrka badeecadaha"**

Qodobka 3aad
Ujeedada Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahaan Ujeedadiisu waxa ay tahay in lagu faahfaahiyo qodobada khuseeya ee sharci Lr.27, ee soo baxay 2020, Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Soomaaliyeed, si lagu dhaqan-geliyo.

3. Haddii badeecadaha lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan ay waafaqsan yihiin shuruudaha hal-beegyadaDalka, Hay'addu waxay bixinaysaa shahaadada la bixintaanka Badeecadda.
4. Haddii Badeecadahu aysan waafaqsanayn shuruudaha hal-beegyada Dalka, Hay'addu waxay soo saaraysaa ogeysiin kusocota soo-dejiyaha oo ah inuu burburiyo ama uu dibudhoofiyo Badeecadda, iyadoo loo eegayo hadba khatarta ay Badeecaddu u leedahay degaanka iyo noolaha, iyadoo khidmadaha ku baxaya burburinta ama dib-u-dhoofinta laga rabo in uu bixiyo soo-dejiyaha.

Qodobka 10aad
Codsiga Shahaadada Fasaxa la-bixidda Badeecadaha

1. Soo-dejiyaha Badeecadaha ku xusan Jadwalka 1aad waa inuu ka codsadaa Hay'adda shahaadada fasaxa badeecadaha kahor ama marka ay Badeecadu timaado furdada ay kasoo galeyso Dalka.
2. Codsiga lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan waa in ay la socdaan:
   b. warqadaha Rarka Badeecadda(Bill of Loading) ama xamuul-diyaaradeedka (Airway Bill);
   t. liiska xirmada (**parking list**);
   j. shahaadada asalka Badeecadda (**certificate of origin**);
   x. qaan-sheegatada (**invoice**);
   kh. dokumintiga furdooyinka Badeecadu socdaalka ku soo martay (haddii uu jiro);
   d. shahaadada waafaqsanaanta, haddii ay jirto;
   r. codsiga lagu sheegay farqada (1) ee qodobkan waa in la sameeyaa kahor inta aan waaxda furdooyinku soo-dejiyaha u fasaxin Badeecadaha;iyo
   s. haddii Badeecaddu wadato shahaadada waafaqsanaanta, baaruhu waa inuu hubiyaa Badeecaddasi uu u xaqiijiyo inay badeecaddu waafaqsantahay midda ku xusan, Codsiga iyo Shahaadada Waafaqsanaanta.

Qodobka 11aad
Bixinta Shahaadada Fasaxa Badeecadda

Baaruhu wuxuu bixinayaa shahaadada fasaxa Badeecadda, haddii hubinta lagu ogaado in Badeecadda iyo shahaadada waafaqsanaantoodu is-leeyihiin.

Qodobka 12aad
Baaridda BadeecadahaFurdooyinka

1. Badeecadaha soo socda waa in lagu baaraa furdooyinka:
   b. badeecadaha ku xusan Jadwalka 1aad ee Qeybta 1aad, ee yimaada furdooyinka Dalkaiyagoo aan wadan shahaadada waafaqsanaanta;
   t. badeecadaha ku xusan Jadwalka 1aad ee Qeybta 1aad, ee yimaada furdooyinka Soomaaliya iyagoo wata shahaadada waafaqsanaanta, balse xaqiijin kadib baaruhu:
      i. u arko in aysan is-lahayn shahaadada waafaqsanaanta iyo Badeecadu; ama
      ii. uu ka shakiyo inaysan waafaqsaneyn hal-beegyadaDalka;
   j. Badeecadaha ku xusan Jadwalka 1aad ee Qeybta 2aad, ee leh tilmaamaha soo socda:
      i. badeecadaha qiimaha ay ku saaran yihiin markabka (freight on board price FOB Price) aysan ka badnayn lacag SH. SO. u dhigma US$ 3,000.00 (saddex kun) oo doolarka Maraykanka ahna cunto, agabka carruurta, waxyaalaha la isku qurxiyo, fiilooyinka korantada, noocyada kala duwan ee doobiyo-

bareesyada, fooneeyeyaasha timaha, kirliyada korontada, qalabka cadceedda(solar), bareesyada iyo daare-demiyeyaasha;

ii. alaabada cayriinka ah ee Badeecadaha laga soo saaro oo sidooda looga ganacsanayo ama laga sameynayo Badeecado aan rukhsad ka haysan Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

iii. mashiinada warshadaha iyo agabka lagu dayactiro warshadaha ee aan rukhsad ka haysan Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed ama hay'ad dawladeed oo kale oo loo idmaday, iyo haddii Mashiinada (qalabka) iyo agabka ganacsi loo keeno hay'ad dawli ah;

x. badeecadaha hoos yimaada heshiis is-af-garad oo Soomaaliya kala dhaxeeya hal wadan ama ka badan, uusanna baaruhu ku qancin inay leeyihiin tayadii looga baahnaa.

kh. badeecadaha lagu baaro furdooyinka waxaa baaraya oo hubinaya baare (inspector) si uu u go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyada Dalka.

d. baaruhu wuxuu muunad ka qaadan karaa Badeecadda u baahan in lagu baaro furdooyinka si uu ugu baaro sheybaar, una go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyadaDalka.

r. soo-dejiyaha Badeecadda waa inuu bixiyaa Khidmadda baarista Badeecadda ee furdooyinka iyo Khidmadda tijaabada muunadda haddii Badeecadda lagu baarayo sheybaarka(laboratory analysis).

s. Soo-dejiyaha Badeecadda u baahan in lagu baaro furdooyinka ayaa mas'uul ka ah khidmadda keydinta, baarista sheybaarka iyo kharash kasta oo kale oo ka dhasha baarista Badeecadda furdooyinka.

sh. baaraha waa inuu u soo saaraa badeecadaha uu go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyada Dalka"shahaadada fasaxa Badeecadda".

dh. haddii baaruhu go'aamiyo in Badeecadda, lagu baaray furdooyinka, aysan waafaqsaneyn hal-beegyada iyo jaan-gooyooyinka Dalka, baaruhu waa inuu maareeyaha Tayo-dhawrka ogeysiiyaa, maareeyuhuna:

i. soo saaraa ogeysiin uu ku farayo soo-dejiyaha in la burburinayo ama uu dib u dhoofiyo Badeecadda, kharashaadka ku baxayana uu bixiyo;

ii. wargeliyaa hay'adaha ay khusayso (marka ay ku habboon tahay), sida Waaxda furdooyinka (customs department)iyo/ama Booliska Soomaaliyeed;

iv. diido in Badeecadda la geliyo Dalka;

v. celiyaa Badeecadda haddii Badeecaddu ku jirto bakhaar u xiran waaxda furdooyinka; ama

vi. uu ku dhegan yahay dabarka hay'addu (SOBS store under seal).

Qodobka 13aad
Xaqiijinta Waqtiga Badeecadda

Haddii badeecaddu ay leedahay waqti qayaxan baaruhu waa inuu hubiyaa kahor inta uusan soo saarin shahaadada fasaxa Badeecadda in waqtiga Badeecadda ku xaddidan kuna qoran yahay ugu yaraan:

b. in waqtiga 1 (hal) sano ama ka badan uga harsan yahay, haddii waqtiga Badeecaddu uu ka badan yahay 1 (hal) sano;

t. ugu yaraan 50% (boqolkiiba konton) ay uga harsan tahay, haddii waqtiga Badeecadda uu yahay 1 (hal) sano ama ka yar.

JADWALKA 1aad

Qodobbada Xeer-nidaamiyaha ee 5(1), 7(1); 7(2); iyo 7(4)
QEYBTA 1AAD

QEYBAHA BADEECADAHA LA MARSIINAYO QIIMEYNTA TAYADA SHIXNADAHA - CBCA

QEYBTA	QEYBAHA GUUD EE ALAABAHA	TILMAANTA
QAYBTA 1	Badeecadaha dawooyinka iyo agabka/qalabka la xiriira	Badecadahan waxay isugu jiraan daawooyinka, iyo dhammaan maaddooyinka caafimaadka, iyo agabka/qalabka loo isticmaalo ujeeddooyinka caafimaad.
QAYBTA 2	Korantada iyo qalabka elektarooniga oo ay ku jiraan qalabka cadceedda (solarka)	Badeecadahan waxay isugu jiraan dhammaan noocyada agabka ama qalabka soo saara ama ku shaqeeya korontada. Tusaale ahaan, dhammaan mishiinada iyo qalabka IT-ga (sida kumbuyuutarrada, daabacayaasha, iskaanarada, hard-drives-ka, processors-ka ,servers-ka, motherboard-yada, falaashyada, routers-ka, iwm), agabka guriga iyo jikada, agabka muusiga iyo codka, qalabka maqalka iyo muuqaalka, nidaamyada iyo agabka isgaarsiinta, qalabka leyrka, fiilooyinka, batariyada, isku-xirayaasha, daare-damiyaasha, furayaasha xiriirsan, matoorrada korontada, koronto-dhaliyeyaasha, gudbiyeyayaasha, dheelitirayaasha korontada (drives) qalabka farsamada gacanta ee korontada ku shaqeeya, qalabka qaybinta shidaalka, TV-yada iyo qalabka la xiriira TV-ga, qalabka saaluunka/is-quxinta, mashiinada madadaalada & mishiinada adeega gaarka ah, iyo dhammaan agabka cadceed (solarka AC (mukeeyfyada) iwm.
QAYBTA 3	Cuntooyinka iyo alaabaha cuntada laga sameeyo	Dhammaan badeecadaha la cuno ee cayriinka ah ama warshadaysan, iyo walxaha loo isticmaalo diyaarintooda. Waxaa kamid ah cuntada diyaarsan, cabitaannada aashitada leh, alaabaha ay ku jirto ama aysan ku jirin nikotiinka ee loogu tala-galay in la nuugo,la neefsado iyada oo aan guban, iyo alaabaha kale ee nikotiinka ku jira ee loogu talagalay in la nuugo oo jirka bani'aadamka la geliyo iwm.
QAYBTA 4	Alaabaha macdanta oo ay ku jiraan batroolka	Cusbada, maaddada Sulphur-ka, carrada iyo dhagaxa, macdanta malaaska (tusaale: ciidda, quartz-ka), lime-ta iyo shamiintada/sibirka oo ay ku jirto maaddada kaolin-ka; macdanta shidaalka, saliidda (ooliyada) iyo alaabaha la qaaciyo (batroolka, naftada iwm); Iskudhisyada kiimikada ah ee aan

		organic ahayn ee biraha qaaliga ah, walxaha shucaaca, iyo dhammaan kiimikooyinka organica ah.
QAYBTA 5	Xoolaha nool	Dhammaan xoolaha nool.
QAYBTA 6	Waxyaabaha kimikada ah	Dhammaan walxaha la sifeeyey ama la diyaariyey, gaar ahaan kuwa gacan ku sameyska ah. Qeybtan waxaa kamid ah dhammaan waxyaabaha la isku qurxiyo, cadarada/baraafuunada, kiimikooyinka lagu dhaqo biyaha, bacrimiyeyaasha, sunta cayayaanka, sunta loogu tala-galay waxyaabo gooni ah oo cayayaan ah, sunta dhirta, sunta funguska iyo waxyaabaha guriga loo isticmaalo sida saabuunta iyo nadiifiyeyaasha, gaas-daarayaasha, taraqa, shumaca, sigaarka, alaabaha batroolka, ooliyada, shidaalka, alaabaha nadaafadda, tarmuusyada, alaabaha carruurta lagu ciyaarsiiyo, alaabaha jikada, xabagta, rinjiga guryaha ee dhismayaasha, jeestada, qoray-dhukayga, dhalaaliyayaasha, iwm.
QAYBTA 7	Alaabaha carruurta	Dhammaan alaabaha ay ku ciyaaraan carruurta, boombalayaasha, baabuurta carruurta iyo agab kasta oo lugo leh, agabka xujooyinka/madadaalada,iwm.
QAYBTA 8	Qalabka makaanikada, qalabka dhismaha iyo agabka gaaska	Dhammaan alaabaha loo isticmaalo farsamada gacanta, injineeriyada, makaanikada iyo/ama dhismayaasha. Waxaa hoos yimaada qalabka farsamada, qalab-marineedka (Conduits and Fittings), Alaabaha birta ka sameysan, alaabaha saqafka, qalabka cabbirka, dhagxaanta dhismaha, alaabaha dhoobka ah, tubbooyinka, biraha dhismaha, alaabaha aluminium-ka iyo birta ka sameysan, haamaha gaaska (ambuubada), furayaasha iyo qufullada, biraha daahyada iyo wixii raaca, kumbasoorayaasha, iyo alaabaha wax lagu nashqadeeyo. Agabka gaaska waxaa kamid ah kuleyliyaasha, burjikooyinka, haamaha gaaska(ambuubada), shooladaha, feynuusyada iwm
QAYBTA 9	Warqadaha iyo agabka qoraalka	Dhamaan waxyaabaha warqadda ka sameysan, buugaagta, waraaqaha daabacaadda, waraaqaha koobiga, waraaqaha suuliga, agabka qoraalka, sabbuuradaha, alaabaha stationary-ga iyo iwm.
QAYBTA 10	Alaabaha guriga la dhigo (kuwa alwaaxa iyo kuwa birta ah)	Dhammaan alaabada guriga ama xafiiska la dhigo ee ka sameysan alwaaxa, geedka bambuuga (del-ka) iyo birta. Waxaa kamid ah

		noocyada kala duwan ee kumusaatooyinka sida Sheets, strips, panels for veneering, fibre boards, densified wood iyo iwm
QAYBTA 11	Alaabaha ka sameysan dunta, haragga, balaastiga iyo bambiirada	Dhamaan alaabta ka samaysan dunta, balaastiga, haragga iyo bambiirada. sida maro-kaneecada, go'yaasha sariirta, timaha burukada, agabka balaastigga, kabaha, suumanka iwm
QAYBTA 12	Alaabaha celiska ah oo ay ku jiraan baabuurta lasoo isticmaalay	Dhammaan waxyaabaha celiska ah sida dharka, kabaha, waxyaabaha korontada iyo elektiroonigga ah, baaskiillada, mootooyinka, alaabaha guriga la dhigto iyo baabuurta iwm.
QAYBTA 13	Badeecadaha iyo agabka dayactirka gaadiidka	Dhammaan alaabta/qalabka la xiriira baabuurta, gaadiidka iyo baaskiillada. Waxaa kamid ah qeybaha spare-partiska ama agabyada dayactirka, sida batariyada, taayirada iyo tubooyinka gudaha taayarka, baaskiillada, spare parts-ka la xiriira mishiinada/qalabka beeraha, garneellada iwm
QAYBTA 14	Qalabka badbaadada	Dhammaan alaabta loo xirto taxaddarka iyo badbaadada aadanaha ama loo isticmaalo is-dhawridda. Tusaalooyinka badeecadahan waxaa kamid ah galoofisyada, suumanka kursiyada gaariga, kabaha, koofiyadaha, qalabka dab-demiska, bustayaasha, qalabka amniga elektaroonigga ah, gambaleelka digniinta dabka, iwm.
QAYBTA 15	Gaadiidka, diyaaradaha, maraakiibta iyo qalabka rarka/xamuulka la xiriira iyo shidaalka (petrochemicals)	waxaa kamid ah gaadiidka, diyaaradaha, maraakiibta iyo qalabka socdaalka la xiriira oo ay ku jiraan mootooyinka iyo shidaalka iyo waxyaabaha shidaalka laga sameeyo (petrol and petrochemicals)

QEYBTA 2AAD

BADEECADAHA AAN LAGA RABIN INAY SOOMARAAN QIIMEYNTA TAYADA SHIXNADAHA KA HOR (CBCA) IYO BAARISTA

1. Shixnadaha qiimaha ay ku saaran yihiin markabka (frieght onboard Value **FOB**) aanu ka badneyn US$ 3,000.00 (saddex kun) doolarka Maraykankamarka laga reebo badeecadaha khatarta leh ee lagu faahfaahiyey Qodobka 9aad(1) (c) (i).
2. Badeecadaha gaarka ee loogu talo-galay mashruuc dawladeed, kuwaas oo soo-iibintooda loo maray nidaam tayo-dhawr oo dammaanad-qaadaya inay waafaqsan yihiin hal-beegyadaDalka.
3. Walxaha ceyriinka ah ee loo keeno si loogu isticmaalo wax-soo-saarka warshadaha oo aan la iibineyn;

4. Shixnadaha safaaradaha/diblomaasiyadeed.
5. Alaabaha gaarka ah ee muwaadiniinta Soomaaliyeed oo Dalka kusoo guryo-noqonaya ama qurba-joogta ah iyo ajaanibta.
6. Alaabaha hoos yimaada heshiiska aqoonsiga tayo-dhawr ee wadaagga ah.
7. Mashiinada (qalabka) warshadaha iyo agabka loo keeno si loogu isticmaalo wax-soo-saarka ee aan iibka aheyn.
8. Alaabaha iyo badeecadaha xoolaha ee hallaawgoodu dhawyahay.
9. Qalabka iyo agabka milatariga, booliska iyo xabsiyada.
10. Xoolaha nool oo ay ku jiraan kalluunka nool, xayawaan-badeedka qolofta leh ee nool, iyo noolayaasha kale ee biyaha.
11. Shahwada xoolaha.
12. Ukumaha kalluunka.
13. Dhirta nool iyo abuurka lagu beero dhirta oo ay ku jiraan agabka beerista dhirta, iyo waxyaabaha la xiriira.
14. Xubnaha, qanjirada iyo dhiiga bini'aadamka, iyo waxyaabaha la xiriira.
15. Walxaha shucaaca bixiya.

QEYBTA 3^{AAD}: BADEECADAHA AANLA OGGOLAYN IN LASOO GELIYO DALKA

ALAABAHA MAMNUUCA AH
Hilibka doofaarka, baruurta, dhogorta, dhiigga, mindhicirka, xubnaha, iyo wax kasta oo laga soo saaro doofaarka.
Hilibka raha (rakaha).
Daawooyinka jawiga baddela iyo dhammaan maan-dooriyeyaasha noocyada, magacyada iyo qaabkasta oo ay leeyihiin.
Khamriga iyo maan-dooriyaha sunta ah nooc walba oo ay yihiin.
Tubaakada nuuckastoo ay tahay (Tubaakada la calaliyo, tubaakada naswaarka(budada ah), mida shiishiidka (sawika), iwm).
Qashin kasta oo ka yimaada warshadaha soosaara; daawada, kimikada, qashinka ka dhasha wax-soo-saarka, iwm (industrial wastes).
Cuntooyinka laga sameeyey dhiigga xoolaha.
Qalabka, mashiinada, iyo waxyaabaha loo isticmaalo khamaarka.
Agabka xayeysiinta sigaarka.
Maan-dooriyaha tabuuga (taboo drugs).
Wax walba oo lid ku ah shareecadda Islaamka.

Badeecadaha mamnuuca ah si gaar ah waa la soo gelin karaa Soomaaliya iyadoo oggolaansho gaar ah laga helayo Hay'ad dawladeed ama Maamulka ay khuseyso ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

QEYBTA 4[AAD]: BADEECADAHA LA XADDIDAY IN LA SOO GELIYO SOOMAALIYA

BADEECADAHA LA XADDIDAY	HAY'ADDA RUKHSADA SOO-DHOOFINTA BIXINAYSA
Eeyaha	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha
Cuntada Xoolaha	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha
Dhamaan maadooyinka sida:-Sodium chloride, Paraffin wax, Ammonium nitrate, Sodium Nitrate, Potassium Chloride, Gelatine, Gunpowder, waxyaabaha qarxa, kaabsulka qarxa ama olola, korantada gubanaysa iyo alaabaha qarxa, macdanta saliidda, polymer acrylic, fiyuusyada qarxa, burburada iyo budada nitrocellulose-ta, aluminium, magnesium, qalabka raajada iyo ilaha kale ee shucaaca iyo tallaalka xoolaha	Hay'adda ay khuseyso
Daawooyinka loogu tala-galay dadka	Wasaaradda Caafimaadka
Daawooyinka xoolaha	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha
Kiimikada bacriminta beeraha	Wasaaradda Beeraha
Buulalerada munaasabadaha iyo dabaal-degyada	Wasaaradda amniga
Baaruudda, walxaha qarxa, fiyuusyada badbaadada, fiyuusyada qarxa	Wasaaradaha amniga, iyo Gaashaandhigga
kaabsulka qarxa ama olola	Wasaaradda amniga iyo Gaashaandhigga
Sunta beeraha ee cayayaan dilayasha	Wasaaradda beeraha
Calaamadaha millitariga, jaakadaha xabbada karin iyo dareeska ciidamada, koofiyadaha ciidamada,	Millatariga, Wasaaradda Amniga
Milatariga, jeebbooyinka, ookiyaalayaasha aragga habeenkii, budadka maasada leh iyo doorbiinnada.	Millatariga, Wasaaradda Amniga
Daawooyinka la isku daro ee keenakhataraha caafimaad iyo kuwa degaanka	Wasaaradda Caafimaadka iyo degaanka
Qaadka ama miraa	Wasaaradaha Ganacsiga, Beeraha iyo caafimaadka

Dhamaan Badeecadaha la xaddiday waxaa si gaar ah loo soo gelin karaa Soomaaliya keliya marka fasax/oggolaansho gaar ah laga helo Hay'adda ay khusayso ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JADWALKA 2^AAD

1. **Astaanta Tayadda Badeecadaha Dibadda Laga Keeno (Import Standardisation Mark)**



(ISM))

2. **Astaanta Xalaalnimada Badeecadda (Halal Mark)**



Tariikh: 28/10/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.143

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA BAARITAANKA IYO XAQIIJINTA TAYO-DHAWRKA BADEECADAHA

XRW - BIXIT
30 OCT 2023
OPM EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.51.10.23** ee **28/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-Dhawrka Badeecadaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta Xeer-Nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-Dhawrka Badeecadaha.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.51.10.23** ee **28/10/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-Dhawrka Badeecadaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-Nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-Dhawrka Badeecadaha

Qodobka 3aad

Xeer-Nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-Dhawrka Badeecadaha waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-116-23
TAARIIKH: 11-12-2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Guuleed
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Mudane, Hamza Abdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA

XEER-NIDAAMIYAHA
BAARITAANKA IYO XAQIIJINTA TAYO-DHAWRKA BADEECADAHA

Waxaa Diyaariyey: Wasaaradda Ganacsiga Iyo Warshadaha, Xukuumadda JFS 2023

CUTUBKA KOWAAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad
Qeexid

Haddii aan si kale loogu sheegin xeer-nidaamiyahan gudihiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid waliba yelanayaa macnaha ku horqoran:

"Xeer-nidaamiye" waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-dhawrka Badeecadaha JFS;

"Hay'adda"waxaa loola jeedaa Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

"**Baarista Badeecadaha Furdooyinka**" waxaa loola jeedaa xaqiijinta waafaqsanaanta Badeecadaha ee hal-beegyada tayo-dhawrka ee lagu sameeyo Dekedaha, Garoomada iyo bar-xudduudeedyada Dalka, ama xarun kasta oo kale oo ay Hay'addu oggolaato;

"**Furdooyin**" waxaa loola jeedaa xudduudaha Dalka laga soo galo (dhulka, cirka iyo badda);

"**Badeeco**"waxaa loola jeedaa shay, alaab ama wax kasta oo ugu dambeyntii noqonkara wax laga ganacsado ama la isticmaalo;

"**Shahaadada fasaxa Badeecadda**" waxaa loola jeedaa dukuminti ay soo saartay Hay'adda oo caddeynaya in tayada Badeecadda la soo dejiyey ay waafaqsantahay jaan-gooyada Tayo-dhawrka;

"**Badeecadda Shatiga leh**" waxaa loola jeedaa Badeecadda ay sida joogtada ah u qiimeyso Hay'adda, una aragto inay waafaqsantahay hal-beegyada Dalka, gobolka ama caalamiga ah ee khuseeya iyadoo la isticmaalayo hab-raac la yaqaan;

"**Hal-beegyada Dalka**" waxaa loola jeedaa hal-beegyada iyo jaan-gooynta uu Golaha Hay'addu shaaciyey si waafaqsan xeer-nidaamiyahan;

"**Badeeco diiwaan-gashan**" waxaa loola jeedaa alaabaha leh heerar joogto ah oo ku aaddan waafaqsanaanta hal-beegyada Dalkaama caalamiga ah, oo ay macquul tahay in laga reebo tijaabada/hubinta Dalka;

"**Badeeco aan diiwan-gashaneyn**" waxaa loola jeedaa alaabada aan lahayn xog hore oo laga tixraaco inay waafaqsan yihiin hal-beegyada tayo-dhawrka, oo ay tahay in la tijaabiyo si loo xaqiijiyo waafaqsanaanta hal-beegyada Dalka;

"**Dabar**" waxaa loola jeedaa xayiridda isticmaalka iyo furitaanka Badeeco inta go'aanka waafaqsanaanta hal-beegyadu kasoo baxayo;

"**Wasiir**" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ee Xukuumadda JFS; iyo

"**JFS**" waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad
Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "**Xeer-nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-dhawrka badeecadaha**"

Qodobka 3aad
Ujeedada Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahaan Ujeedadiisu waxa ay tahay in lagu faahfaahiyo qodobada khuseeya ee sharci Lr.27, ee soo baxay 2020, Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Soomaaliyeed, si lagu dhaqan-geliyo.

bareesyada, fooneeyeyaasha timaha, kirliyada korontada, qalabka cadceedda(solar), bareesyada iyo daare-demiyeyaasha;

ii. alaabada cayriinka ah ee Badeecadaha laga soo saaro oo sidooda looga ganacsanayo ama laga sameynayo Badeecado aan rukhsad ka haysan Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

iii. mashiinada warshadaha iyo agabka lagu dayactiro warshadaha ee aan rukhsad ka haysan Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed ama hay'ad dawladeed oo kale oo loo idmaday, iyo haddii Mashiinada (qalabka) iyo agabka ganacsi loo keeno hay'ad dawli ah;

x. badeecadaha hoos yimaada heshiis is-af-garad oo Soomaaliya kala dhaxeeya hal wadan ama ka badan, uusanna baaruhu ku qancin inay leeyihiin tayadii looga baahnaa.

kh. badeecadaha lagu baaro furdooyinka waxaa baaraya oo hubinaya baare (inspector) si uu u go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyada Dalka.

d. baaruhu wuxuu muunad ka qaadan karaa Badeecadda u baahan in lagu baaro furdooyinka si uu ugu baaro sheybaar, una go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyadaDalka.

r. soo-dejiyaha Badeecadda waa inuu bixiyaa Khidmadda baarista Badeecadda ee furdooyinka iyo Khidmadda tijaabada muunadda haddii Badeecadda lagu baarayo sheybaarka(laboratory analysis).

s. Soo-dejiyaha Badeecadda u baahan in lagu baaro furdooyinka ayaa mas'uul ka ah khidmadda keydinta, baarista sheybaarka iyo kharash kasta oo kale oo ka dhasha baarista Badeecadda furdooyinka.

sh. baaraha waa inuu u soo saaraa badeecadaha uu go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyada Dalka"shahaadada fasaxa Badeecadda".

dh. haddii baaruhu go'aamiyo in Badeecadda, lagu baaray furdooyinka, aysan waafaqsaneyn hal-beegyada iyo jaan-gooyooyinka Dalka, baaruhu waa inuu maareeyaha Tayo-dhawrka ogeysiiyaa, maareeyuhuna:

i. soo saaraa ogeysiin uu ku farayo soo-dejiyaha in la burburinayo ama uu dib u dhoofiyo Badeecadda, kharashaadka ku baxayana uu bixiyo;

ii. wargeliyaa hay'adaha ay khusayso (marka ay ku habboon tahay), sida Waaxda furdooyinka (customs department)iyo/ama Booliska Soomaaliyeed;

iv. diido in Badeecadda la geliyo Dalka;

v. celiyaa Badeecadda haddii Badeecaddu ku jirto bakhaar u xiran waaxda furdooyinka; ama

vi. uu ku dhegan yahay dabarka hay'addu (SOBS store under seal).

Qodobka 13aad
Xaqiijinta Waqtiga Badeecadda

Haddii badeecaddu ay leedahay waqti qayaxan baaruhu waa inuu hubiyaa kahor inta uusan soo saarin shahaadada fasaxa Badeecadda in waqtiga Badeecadda ku xaddidan kuna qoran yahay ugu yaraan:

b. in waqtiga 1 (hal) sano ama ka badan uga harsan yahay, haddii waqtiga Badeecaddu uu ka badan yahay 1 (hal) sano;

t. ugu yaraan 50% (boqolkiiba konton) ay uga harsan tahay, haddii waqtiga Badeecadda uu yahay 1 (hal) sano ama ka yar.

Qodobka 14aad

Reebbanaanta Sii-dayn Badeecadaan Lahayn Shahaado Fasax

Haddii aanu soo-dejiyuhu wadanin shahaadada fasaxa Badeecadda, baaruhu wuxuu kaliya oo Badeecaddaas u ogolaan karaa in lagu xareeyo bakhaarka maamulka furdooyinka ama keydka dabarka Hay'adda (SOBS store under seal), ilaa laga caddeeyo waajibaadka sharci ee lagu leeyahay soo-dejiyaha aan wadan shahaadada fasaxa Badeecadda.

Qodobka 15aad

BadeecadLagu Sameeyey Dal Kale

Soo-dejiyaha badeeco lagu farsameeyey/laga soo saaray dal heshiis kala dhexeeyo Soomaaliya (oo labada dhinacba ay iska aqbalaan summadaha tayo ee badeecadaha ay soo saaraan), islamarkaana wadata summadda caddeynta tayada Badeecadda ee Dalkaas, wuxuu dalbanayaa islamarkaana la siinayaa shahaadada fasaxa Badeecadda, iyadoo aan Badeecaddaas la marsiin Qiimeynta Tayada Shixnadaha ka hor – (Commercial Banking & Credit Analyst) CBCA.

Qodobka 16aad

Burburinta ama Dib-u-dhoofinta Badeecadda

1. Haddii la soo saaro ogeysiiska burburinta ama dib-u-dhoofinta Badeecadaha aan waafaqsaneynhal-beegyadaDalka, waxaa lagu fulinayaa muddo 14 (afar iyo toban) maalimo shaqo, iyadoo khidmadaha ka dhalanaya uu bixinayo soo-dejiyuhu.
2. Badeecadda waa in:
    b. la burburiyaa haddii aysan khatar weyn u geysaneyn degaanka; ama
    t. dib loogu celiyaa dalkii markii hore laga keenay, haddii ay khatar baaxad leh u geysaneyso bey'adda.
3. Badeecadda dib loo celinayo looma dhoofin karo dal kale oo aan ahayn dalkii laga keenay. Marka la fulinayo ogeysiiska dib-u-dhoofinta ama gubidda Badeecaddaha waa in loo fuliyaa si waafaqsan shuruucda khusaysa.

Qodobka 17aad

Astaanta Tayada BadeecaddaDibadda Laga Keeno

(Import Standardisation Mark (ISM)

Badeecadwalba oo saameynaysa caafimaadka bulshada, bed-qabka degaanka iyo waxyaabaha korantada ku shaqeeya (electronics) inta aan la siin shahaadada fasaxa waa in la siiyaa "astaanta tayada Badeecadda dibadda laga keeno", haddii uu shuruudihii kale soo buuxiyey soo-dejiyuhu.

Qodobka 18aad

Astaanta Xalaalnimada Badeecadda (Halal Mark)

1. Wax walba oo hunguriga la mariyo, taabta ama la marsado jirka (lagu subkado tin iyo oogomidayrabto ha ahaatee) ama la xirto (marasho iyo ilasho), waa in marka la hubiyo inay waafaqsanyihiin hal-beegyadaDalka ee xalaasha khuseeya la siiyaa "astaanta xalaalnimada Badeecadda".
2. Waxaa kale oo astaanta xalaalnimada (Halal Mark) qaadan kara badeeco walba oo astaan xalaal ka wadata hay'ad ama wadan heshiis is-aqoonsi kala dhexeeyo Hay'adda Taya-dhawrka Soomaaliyeed.

Qodobka 19aad

Dhaqan-gal

Xeer-nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-dhawrka Badeecadaha JFS wuxuu dhaqan-gelayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirradda, Ra'sul-wasaaruhuna Dekreeto ku soo saaro, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JADWALKA 1aad

Qodobbada Xeer-nidaamiyaha ee 5(1), 7(1); 7(2); iyo 7(4)
QEYBTA 1AAD

QEYBAHA BADEECADAHA LA MARSIINAYO QIIMEYNTA TAYADA SHIXNADAHA - CBCA

QEYBTA	QEYBAHA GUUD EE ALAABAHA	TILMAANTA
QAYBTA 1	Badeecadaha dawooyinka iyo agabka/qalabka la xiriira	Badecadahan waxay isugu jiraan daawooyinka, iyo dhammaan maaddooyinka caafimaadka, iyo agabka/qalabka loo isticmaalo ujeeddooyinka caafimaad.
QAYBTA 2	Korantada iyo qalabka elektarooniga oo ay ku jiraan qalabka cadceedda (solarka)	Badeecadahan waxay isugu jiraan dhammaan noocyada agabka ama qalabka soo saara ama ku shaqeeya korontada. Tusaale ahaan, dhammaan mishiinada iyo qalabka IT-ga (sida kumbuyuutarrada, daabacayaasha, iskaanarada, hard-drives-ka, processors-ka ,servers-ka, motherboard-yada, falaashyada, routers-ka, iwm), agabka guriga iyo jikada, agabka muusiga iyo codka, qalabka maqalka iyo muuqaalka, nidaamyada iyo agabka isgaarsiinta, qalabka leyrka, fiilooyinka, batariyada, isku-xirayaasha, daare-damiyaasha, furayaasha xiriirsan, matoorrada korontada, koronto-dhaliyeyaasha, gudbiyeyayaasha, dheelitirayaasha korontada (drives) qalabka farsamada gacanta ee korontada ku shaqeeya, qalabka qaybinta shidaalka, TV-yada iyo qalabka la xiriira TV-ga, qalabka saaluunka/is-quxinta, mashiinada madadaalada & mishiinada adeega gaarka ah, iyo dhammaan agabka cadceed (solarka AC (mukeeyfyada) iwm.
QAYBTA 3	Cuntooyinka iyo alaabaha cuntada laga sameeyo	Dhammaan badeecadaha la cuno ee cayriinka ah ama warshadaysan, iyo walxaha loo isticmaalo diyaarintooda. Waxaa kamid ah cuntada diyaarsan, cabitaannada aashitada leh, alaabaha ay ku jirto ama aysan ku jirin nikotiinka ee loogu tala-galay in la nuugo,la neefsado iyada oo aan guban, iyo alaabaha kale ee nikotiinka ku jira ee loogu talagalay in la nuugo oo jirka bani'aadamka la geliyo iwm.
QAYBTA 4	Alaabaha macdanta oo ay ku jiraan batroolka	Cusbada, maaddada Sulphur-ka, carrada iyo dhagaxa, macdanta malaaska (tusaale: ciidda, quartz-ka), lime-ta iyo shamiintada/sibirka oo ay ku jirto maaddada kaolin-ka; macdanta shidaalka, saliidda (ooliyada) iyo alaabaha la qaaciyo (batroolka, naftada iwm); Iskudhisyada kiimikada ah ee aan

		organic ahayn ee biraha qaaliga ah, walxaha shucaaca, iyo dhammaan kiimikooyinka organica ah.
QAYBTA 5	Xoolaha nool	Dhammaan xoolaha nool.
QAYBTA 6	Waxyaabaha kimikada ah	Dhammaan walxaha la sifeeyey ama la diyaariyey, gaar ahaan kuwa gacan ku sameyska ah. Qeybtan waxaa kamid ah dhammaan waxyaabaha la isku qurxiyo, cadarada/baraafuunada, kiimikooyinka lagu dhaqo biyaha, bacrimiyeyaasha, sunta cayayaanka, sunta loogu tala-galay waxyaabo gooni ah oo cayayaan ah, sunta dhirta, sunta funguska iyo waxyaabaha guriga loo isticmaalo sida saabuunta iyo nadiifiyeyaasha, gaas-daarayaasha, taraqa, shumaca, sigaarka, alaabaha batroolka, ooliyada, shidaalka, alaabaha nadaafadda, tarmuusyada, alaabaha carruurta lagu ciyaarsiiyo, alaabaha jikada, xabagta, rinjiga guryaha ee dhismayaasha, jeestada, qoray-dhukayga, dhalaaliyayaasha, iwm.
QAYBTA 7	Alaabaha carruurta	Dhammaan alaabaha ay ku ciyaaraan carruurta, boombalayaasha, baabuurta carruurta iyo agab kasta oo lugo leh, agabka xujooyinka/madadaalada,iwm.
QAYBTA 8	Qalabka makaanikada, qalabka dhismaha iyo agabka gaaska	Dhammaan alaabaha loo isticmaalo farsamada gacanta, injineeriyada, makaanikada iyo/ama dhismayaasha. Waxaa hoos yimaada qalabka farsamada, qalab-marineedka (Conduits and Fittings), Alaabaha birta ka sameysan, alaabaha saqafka, qalabka cabbirka, dhagxaanta dhismaha, alaabaha dhoobka ah, tubbooyinka, biraha dhismaha, alaabaha aluminium-ka iyo birta ka sameysan, haamaha gaaska (ambuubada), furayaasha iyo qufullada, biraha daahyada iyo wixii raaca, kumbasoorayaasha, iyo alaabaha wax lagu nashqadeeyo. Agabka gaaska waxaa kamid ah kuleyliyaasha, burjikooyinka, haamaha gaaska(ambuubada), shooladaha, feynuusyada iwm
QAYBTA 9	Warqadaha iyo agabka qoraalka	Dhamaan waxyaabaha warqadda ka sameysan, buugaagta, waraaqaha daabacaadda, waraaqaha koobiga, waraaqaha suuliga, agabka qoraalka, sabbuuradaha, alaabaha stationary-ga iyo iwm.
QAYBTA 10	Alaabaha guriga la dhigo (kuwa alwaaxa iyo kuwa birta ah)	Dhammaan alaabada guriga ama xafiiska la dhigo ee ka sameysan alwaaxa, geedka bambuuga (del-ka) iyo birta. Waxaa kamid ah

		noocyada kala duwan ee kumusaatooyinka sida Sheets, strips, panels for veneering, fibre boards, densified wood iyo iwm
QAYBTA 11	Alaabaha ka sameysan dunta, haragga, balaastiga iyo bambiirada	Dhamaan alaabta ka samaysan dunta, balaastiga, haragga iyo bambiirada. sida maro-kaneecada, go'yaasha sariirta, timaha burukada, agabka balaastigga, kabaha, suumanka iwm
QAYBTA 12	Alaabaha celiska ah oo ay ku jiraan baabuurta lasoo isticmaalay	Dhammaan waxyaabaha celiska ah sida dharka, kabaha, waxyaabaha korontada iyo elektiroonigga ah, baaskiillada, mootooyinka, alaabaha guriga la dhigto iyo baabuurta iwm.
QAYBTA 13	Badeecadaha iyo agabka dayactirka gaadiidka	Dhammaan alaabta/qalabka la xiriira baabuurta, gaadiidka iyo baaskiillada. Waxaa kamid ah qeybaha spare-partiska ama agabyada dayactirka, sida batariyada, taayirada iyo tubooyinka gudaha taayarka, baaskiillada, spare parts-ka la xiriira mishiinada/qalabka beeraha, garneellada iwm
QAYBTA 14	Qalabka badbaadada	Dhammaan alaabta loo xirto taxaddarka iyo badbaadada aadanaha ama loo isticmaalo is-dhawridda. Tusaalooyinka badeecadahan waxaa kamid ah galoofisyada, suumanka kursiyada gaariga, kabaha, koofiyadaha, qalabka dab-demiska, bustayaasha, qalabka amniga elektaroonigga ah, gambaleelka digniinta dabka, iwm.
QAYBTA 15	Gaadiidka, diyaaradaha, maraakiibta iyo qalabka rarka/xamuulka la xiriira iyo shidaalka (petrochemicals)	waxaa kamid ah gaadiidka, diyaaradaha, maraakiibta iyo qalabka socdaalka la xiriira oo ay ku jiraan mootooyinka iyo shidaalka iyo waxyaabaha shidaalka laga sameeyo (petrol and petrochemicals)

QEYBTA 2^{AAD}

BADEECADAHA AAN LAGA RABIN INAY SOOMARAAN QIIMEYNTA TAYADA SHIXNADAHA KA HOR (CBCA) IYO BAARISTA

1. Shixnadaha qiimaha ay ku saaran yihiin markabka (frieght onboard Value **FOB**) aanu ka badneyn US$ 3,000.00 (saddex kun) doolarka Maraykankamarka laga reebo badeecadaha khatarta leh ee lagu faahfaahiyey Qodobka 9^{aad}(1) (c) (i).
2. Badeecadaha gaarka ee loogu talo-galay mashruuc dawladeed, kuwaas oo soo-iibintooda loo maray nidaam tayo-dhawr oo dammaanad-qaadaya inay waafaqsan yihiin hal-beegyadaDalka.
3. Walxaha ceyriinka ah ee loo keeno si loogu isticmaalo wax-soo-saarka warshadaha oo aan la iibineyn;

QEYBTA 4[AAD]: BADEECADAHA LA XADDIDAY IN LA SOO GELIYO SOOMAALIYA

BADEECADAHA LA XADDIDAY	HAY'ADDA RUKHSADA SOO-DHOOFINTA BIXINAYSA
Eeyaha	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha
Cuntada Xoolaha	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha
Dhamaan maadooyinka sida:-Sodium chloride, Paraffin wax, Ammonium nitrate, Sodium Nitrate, Potassium Chloride, Gelatine, Gunpowder, waxyaabaha qarxa, kaabsulka qarxa ama olola, korantada gubanaysa iyo alaabaha qarxa, macdanta saliidda, polymer acrylic, fiyuusyada qarxa, burburada iyo budada nitrocellulose-ta, aluminium, magnesium, qalabka raajada iyo ilaha kale ee shucaaca iyo tallaalka xoolaha	Hay'adda ay khuseyso
Daawooyinka loogu tala-galay dadka	Wasaaradda Caafimaadka
Daawooyinka xoolaha	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha
Kiimikada bacriminta beeraha	Wasaaradda Beeraha
Buulalerada munaasabadaha iyo dabaal-degyada	Wasaaradda amniga
Baaruudda, walxaha qarxa, fiyuusyada badbaadada, fiyuusyada qarxa	Wasaaradaha amniga, iyo Gaashaandhigga
kaabsulka qarxa ama olola	Wasaaradda amniga iyo Gaashaandhigga
Sunta beeraha ee cayayaan dilayasha	Wasaaradda beeraha
Calaamadaha millitariga, jaakadaha xabbada karin iyo dareeska ciidamada, koofiyadaha ciidamada,	Millatariga, Wasaaradda Amniga
Milatariga, jeebbooyinka, ookiyaalayaasha aragga habeenkii, budadka maasada leh iyo doorbiinnada.	Millatariga, Wasaaradda Amniga
Daawooyinka la isku daro ee keenakhataraha caafimaad iyo kuwa degaanka	Wasaaradda Caafimaadka iyo degaanka
Qaadka ama miraa	Wasaaradaha Ganacsiga, Beeraha iyo caafimaadka

Dhamaan Badeecadaha la xaddiday waxaa si gaar ah loo soo gelin karaa Soomaaliya keliya marka fasax/oggolaansho gaar ah laga helo Hay'adda ay khusayso ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JADWALKA 2^{AAD}

1. **Astaanta Tayadda Badeecadaha Dibadda Laga Keeno (Import Standardisation Mark)**



IMPORT STANDARDIZATION MARK

(ISM))

2. **Astaanta Xalaalnimada Badeecadda (Halal Mark)**



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 09/11/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.144

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABADSUGIDDA QARANKA

XRW - BIXIT
12 NOV 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 1aad farqadda 11aad ee Sharci LR.003 ee soo baxay 08/ Maarso 2023 Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay REF.WAG/XWD/703/23 ee ku taariikheysan 04/11/2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.52.11.23** ee **09/11/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.52.11.23** ee **09/11/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Amniga loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

Qodobka 3aad

Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-117-23
TAARIIKH: 11-12-2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

XEER-NIDAAMIYAHA
Hay’adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka
(XN-HSNQ)

2023

XEER Lr. 144 ee soo baxay 09/11/2023. Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda (HSNQ)

ARAR

Iyadoo la fulinayo Amarka Madaxda Sare ee Dalka, lagana anba qaadayo **baahida weyn ee loo qaba**y in shaqada, awoodaha iyo dhammaan arrimaha **Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda (HSNQ)** khuseeya ay noqdaan kuwa qeexan oo sharciyad ku salaysan; waxaa la diyaariyey Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (HSNQ).

Taariikhdu markii ay ahayd 12-kii Desembar 2022 ayaa **Wasiirka Amniga Gudaha** Hindise-sharciyeedka HSNQ ku lifaaqay codsiga soo-jeedinta iyo gudbinta, ka dib markii uu helay ra'yiga iyo talada **Garyaqaanka Guud ee Qaranka**.
Sidoo kale, 5-tii Jannaayo 2023, ayaa **Golaha Wasiirradu** cod aqlabiyad ah ku ansixiyey Hindise-sharciyeedka Hay'adda, isla taariikhdaas ayaana **Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS** amray in si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka.

Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka wuxuu Golaha Shacabka gaaray taarikhdu markay ahayd 7-dii Jannaayo 2023, ka dibna wuxuu maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad.

Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee **Dastuurka KMG** ku ansixiyey Hindisaha HSNQ 6-dii Febaraayo 2023, isla markaana waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda dastuuriga ah uga gutaan.

Golaha Aqalka Sare wuxuu asna dhankiisa ansixiyey 22-kii Febraayo 2023 isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga bedelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG.
Taariikhdu markii ay ahayd 28-kii Feebaraayo 2023, ayaa Golaha Shacabku Hindise- sharciyeedka HSNQ u gudbiyey **Madaxweynaha JFS** si waafaqsan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG, si uu u meel-mariyo, isla markaana loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda una noqdo Sharci dhaqangal ah, si waafaqsan Qodobka 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Ugu danbayntii, Madaxweynaha JFS ayaa 8-dii Maarso 2023 **saxiixay**, isla markaana
meel-mariyey Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda
Qaranka, Sharci Lr.004 ee 08/03/2023, waxaana lagu soo saaray **Faafinta Rasmiga ah**, sidaas ayuuna Sharciga HSNQ dhaqangal ku noqdey.

Sharciga HSNQ wuxuu qeexay Mabaadi'da hagaysa shaqada Hay'adda, wuxuuna xeeriyey arrimaha asaasiga ah ee khuseeya qaab-dhismeedka Hay'adda, maqaamkeeda sharciyeed, shaqadeeda iyo awoodaheeda. Wuxuu kaloo caddeeyey

xuquuqda asaasiga ah ee xubnaha Hay'adda, awoodahooda, waxayaabaha ka reebban, waajibaadka iyo hawl-gelinta ciidanka iyo arrimo kale oo muhiim u ah shaqada HSNQ.
Dhanka kale, sharciga HSNQ wuxuu caddeeyey in HSNQ yeelaneyso **Xeer- nidaamiye** dhammeystiraya isla markaana faahfaahinaya arrimo badan oo shaqada HSNQ lama huraan u ah, oo sharciga Hay'addu u dhaafay in Xeer- nidaamiyuhu xeeriyo. Xeer-nidaamiyahaas oo uu soo saari doono Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 99aad, farqada (b) ee Dastuurka KMG ah.
Waxyaabaha muhiimka ah ee sharciga HSNQ uu tilmaamay in lagu nidaamiyo ama uu u xawilay in loo raaco si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Hay'adda waxaa ka mid ah:

- **a)** Faahfaahinta hannaanka shaqo-ka-saaridda, keyd-gelinta iyo xil-ka-qaadista xubnaha Hay'adda (Qdobka 12aad faqradaha (3) iyo (4), lala akhriyay Qodobka 28aad ee sharciga Hay'adda);
- **b)** Waajibka Agaasimaha Guud (Taliyaha) ee Hay'adda ka saaran ilaalinta iyo meel-marinta Sharciga, Xeer-nidaamiyaha iyo Xeer-hoosaadka HSNQ (Qodbka 12aad (8));
- **c)** Qeexidda Kaaliyaha noqonaya sii-hayaha xilka iyo xafiiska Agaasimaha Guud/Taliyaha ee Hay'adda markii uu bannaanaado sabab ay ahaataba (Qodobka 14aad (2));
- **d)** Nidaaminta mushaaraadka, gunnooyinka iyo guud ahaan xuquuqda xubnaha Hay'adda (Qodobka 23aad, lala akhriyay Qodobka 25aad).
- **e)** Nidaaminta derejooyinka iyo dallacaadda ciidanka iyo guud ahaan xubnaha Hay'adda (Qodobka 25aad (7) iyo Qodobka 27aad (4));
- **f)** Habka cabashada iyo dacwad sheegashada xubnaha Hay'adda iyo cid kasta oo heshiis kula shaqeeya HSNQ (Qodobka 30aad);
- **g)** Meelaha kale ee sharciga Hay'addu Xeer-nidaamiyaha ku tilmaamay waxaa ka mid ah: (Qodobka 12aad (6), Qodobka13aad (4) iyo Qodobka 21aad (7)).

CUTUBKA KOWAAD QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad Eray-bixin

1. Haddii aan Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa si kale loogu sheegin, ereyada soo socda, waxay yeelanayaan macnaha iyo fasiraadda mid kasta ku hor qoran:

a) Xeer-nidaamiye: Waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye faahfaahinaya hawlaha Hay'adda, laguna dhaqan-gelinayo sharciga HSNQ isla

markaasna ay soo saaraan Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 99aad (b) ee Dastuurka KMG iyo Qodobada Sharciga HSNQ.

b) Xeer-hoosaad: Waa Xeer maamul oo hagaya laguna socodsiinayo shaqada joogtada ah ee HSNQ, waxaana soo saara Agaasimaha Guud/Taliyaha ee HSNQ si waafaqsan Qodobka 1aad (12) iyo Qodobka 6aad (3) ee Sharciga HSNQ iyo Xeer-nidaamiyahan.

c) Golaha Wasiirrada: Waxaa loola jeedaa Golaha Wasiirrada Jahmuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

d) Taliyaha: Waxaa loola jeedaa Taliyaha / Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.

e) Ku-sime: waa mas'uul si ku-meel-gaar ah u haya xil inta uu qofkii ku magacawnaa uu xafiiska ku soo laabanayo, waxaana xilka u dhiiba isla qofka jagada haya ee dalka uga maqnaanaya safar, fasax ama duruuf caafimaad awgeed.

f) Sii-haye: waa mas'uul haya xil qofkii hayay aanu ku soo noqoneyn oo uu dhintay ama xilka laga qaaday ama uu is-casilay, wuxuuna sii- hayuhu xilka hayaa ilaa laga magacaabo ama laga doorto qofkii xilkaas qaban lahaa.

g) Xubin: Xubanaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.

h) Ciidan: Ciidanka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad sugidda Qaranka.

i) Amar-ciidan: waa amar kasta oo ka soo baxa madaxda ama taliyeyaasha ciidanka heer kasta oo ay tahayba, kuwaas oo ay ka mid yihiin, balse aan ku koobnayn, joogidda, tegista meeshii qof kasta lagu qeybshey, dhigista wax kasta meesha ku habboon iyo gudashada waajib kasta waqtigii iyo sidii loogu talagalay.

j) Asluub ama Dishibiliin ciidan: waa caadeysiga ilaalinta anshaxa, xeerarka ciiddannimo iyo gudashada waajibaadka ciiddannimo si sax ah oo xil-kasnimo iyo daacadnimo ku jirto.

k) Anshax: waxaa loola jeedaa hab-dhaqan iyo caado ku salaysan mabaadi', qiyam iyo xeerar ay tahay in la ilaaliyo laguna dhaqmo oo tilmaamaya sida habboon iyo sida aan habboonayn.

l) Anshax-marin: edbinta iyo ganaaxidda qof ku dhacay wax liddi ku ah anshaxa, isla markaana ay bixiso cid awood sharci u leh, si waafaqsan sharciga;

m) Adeegsiga Maandooriye: isticmaalka wax kasta oo xiska (maanka) qofka bedeli kara ama waxyeello maskaxeed ama sakhraamid keeni kara muddo gaaban ama dheer, qaabkii la doonaba ha loo adeegsadee, sida: cunid, cabid, dhuuqid, ursasho, durid cirbad, shidasho iwm.

n) Saldhig mushaar: waxaa loola jeedaa mushaar bileedka xubinta oo aan Gunno lahayn;

o) Hawlgab: waxaa loola jeedaa xubin gaaray da'da shaqo ka-fariisiga ee ku qeexan sharciga HSNQ.

2. Xuruufta hoos ku xusan mid kasta waxaa laga soo gaabiyey ereyada ku hor qoran:

a) HSNQ: Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka;

b) XN-HSNQ: Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka;

c) XH-HSNQ: Xeer-hoosaadka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka;

d) AG: Agaasimaha Guud ee HSNQ.

Qodobka 2aad

Magaca iyo Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (XN-HSNQ)".

2. Xeer-nidaamiyahan ujeeddadiisa waxaa ka mid ah arrimaha soo socda:

a) Meel-marinta Qodobbada 12aad, 13aad, 14aad, 21aad, 23aad, 25aad, 27aad iyo 30aad ee sharciga HSNQ, Qodobbadaas oo tilmaamaya in HSNQ yeelaneyso Xeer-nidaamiye faahfaahinaya ama nidaaminaya arrimo uu sharciga Hay'addu xeeriyey;

b) Caddeynta iyo faafaahinta arrimaha dhammeystirka u baahan ee la xiriira shaqada Hay'adda;

c) Daboolidda baahiyaha taagan ee ku aaddan nidaaminta awoodaha, hawlaha iyo gudashada waajibaadka HSNQ.

Qodobka 4aad

Qaadashada ama Qorista Xubno Cusub

1. Qorista xubnaha cusub ee HSNQ waxaa loo qaadanayaa si waafaqsan Qodobbada 17, 18 iyo 19 ee Sharciga Hay'adda HSNQ, Xeer-nidaamiyahan iyo Xeer-hoosaadka Hay'adda.
2. Xubinnimada HSNQ lama soo doonto, lagamana soo ergeeyo, ee xubnaha cusub waxaa lagu qaataa qaab xulasho ah iyo habraac gooni ah oo ku salaysan qorshe iyo baahi gaar ah oo ay Hay'addu qabto oo keli ah, baahidaasna waxaa xadidaya ama jaan-goynaya Taliyaha Hay'adda ama ciddii kale ee uu u wakiisho.
3. Looma qaadan karo xubinnimada Hay'adda qof aan baahi shaqo loo qabin, xuquuqdiisana lagu soo darin miisaaniyadda Hay'adda ama aan loo hayn qaab kale oo lagu dabooli karo xuquuqdiisa.
4. Qof kasta oo ku soo biiraya ciidanka HSNQ, waxaa la marsiinayaa baaris amni, caafimaad iyo mid maandooriye, qofkii laga helo mid ka mid ah cudurrada faafa ama cudur aan u suuragalin karin gudashada waajibaadka laga rabo, kama mid noqonayo HSNQ.
5. Ciidanka horey uga mid noqdey HSNQ; arrimaha la xiriira baaristooda caafimaad waxaa loo raacayaa habraaca baarista caafimaadka ee Hay'adda.
6. Guud ahaan, habka loo qorayo iyo sida loo hubinayo shuruudaha laga doonayo qof kasta oo ka mid noqonaya ciidanka HSNQ; waxaa loo raacayaa si waafaqsan Xeer-hoosaadka Hay'adda.

Qodobka 5aad
Waajibaadka Shaqo ee Ciidanka

1. Xubnaha ciidanka HSNQ oo dhan, waxaa waajib ku ah in ay qabtaan hawlaha loo xilsaaray ayana fuliyaan amarrada sharciga ah ee ay siiyaan madaxda ka sarraysa iyo madaxda kale ee awoodda u leh.
2. Xubanaha Ciidanku, waxay si joogto ah u gudanayaan shaqada loo idmaday, waxaana loo diri karaa meel kasta waqti kasta, si ay u fuliyaan shaqo loo idmaday.
3. Ciidanka HSNQ waxay qabanayaan hawlaha la xariira sugidda amniga iyo xasilloonida amniga qaranka, iyagoo raacaya tilmaamaha iyo farriimaha ay madaxdu siiyaan.
4. Taliyeyaasha ciidanka HSNQ, waxay xiriir wada shaqayn oo wanaagsan la yeelanayaan madaxda ciidammada kale, hay'adaha amniga iyo cadaaladda markii loo baahdaba.
5. Si loo xaqiijiyo ujeeddadii loo abuurey ciidanka HSNQ, askari kasta waa inuu ka marnaadaa naf-jecleysi, waana inuu ku tilmaamnaadaa dhaqan- wanaag iyo hufnaan.
6. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka HSNQ waxaa waajib ku ah inuu aqoonsado magaca iyo sharafta cutubkiisa, waana inuu ka fogaado tallaabo iyo eray kasta oo hoos u dhigi kara magaca iyo sharafta cutubkiisa, isla markaana inta tabartiisa iyo kartidiisa ah waa inuu ku dadaalo inuu kor u qaado magacaas.
7. Haddii xubin ka tirsan ciidanka uusan ku dhaqmin anshax wanaag iyo sharaf, waa in madaxdiisu ka qaado tallaabo sharciga waafaqsan.

Qodobka 6aad
Amar Ciidan

Dhammaan waajibaadka Ciidanka HSNQ waxaa saldhig u ah oo ay ka unkamaan amar, oo ah dhidibka jiritaanka ciidannimo, wuxuuna ku dhisan yahay ismaqal iyo kala- sarrayn, sidaasi darteed, xubin kasta oo ciidanka HSNQ waxaa waajib ku ah qaadashada amarrada madaxdiisa goor kasta iyo meel kastaba.

Qodobka 7aad
Asaluub (Dishibiliin) Ciidan

1. Asluubta ama dishibiliinka ciidannimo waa mid ka mid ah tiirarka ugu weyn ee hab-dhaqanka, xeerka askarnimo iyo waajibka koowaad ee askari iyo sarkaal kasta laga rabo, derejo kasta ha lahaadee.
2. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka HSNQ waxaa waajib ku ah inuu noqdo tusaale looga dayan karo dhaqan-wanaagga mar kasta iyo goob kasta, iyo ilaalinta anshaxa iyo xeerarka ciidannimo.

Qodobka 8aad
Nadaafadda Qof Ahaaneed

1. Qof kasta oo ciidanka HSNQ ka tirsan waa inuu ku sugnaado heerka ugu sarreeya ee nadaafadda, waana inuu si joogto ah isku daryeelo isla markaana uu ku dadaalo nadaafadda jirkiisa iyo dirayskiisa (labbiskiisa).
2. Ciidanka labbisan ee HSNQ waxay la bixi karaan timo xannaanaysan oo ku habboon.
3. Waxaa la samaynayaa kormeer iyo fatashaad joogto ah si loo hubiyo in la raacay hababka nadaafadda qofeed iyo xaruneed, waana la anshax-marinayaa ciddii ku xadgudubta.

Qodobka 9aad
Kala-sarreynta Ciidanka

1. Kala-sarreyntu waa u hogaansanaanta derejaba derejada ay ka sarreyso iyo ilaalinta waajibaadka ka dhalanaya, waajibka ugu horeeya ee kala-sarreyntuna waa ismaqal ka dhaxeeya loo-taliyaha iyo madaxdiisa marka shaqo dhex timaado, isla markaana ismaqalku waa inuu noqdaa deg-deg, is-xushmayn iyo mid aan kala dhinayn.
2. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka HSNQ waa inuu u hogaansanaadaa, xaq- dhowraa madaxdiisa iyo madaxda kale ee ciidamada kale ka tirsan iyo sidoo kale madaxda rayidka ah ee Qaranka.
3. Xubintii u hoggaansami waaya amar sharci ah oo madaxda ka sarreysa siisay, waxaa la marsiinayaa xeerka anshaxa Hay'adda.
4. Dhammaan Ciidanka HSNQ waxaa waajib ku ah in ay dhowraan ilaaliyaanna kala-sarreynta talinta iyo kala-sarreynta ciidannimo.

Qodobka 10aad
Derejada Ciidanka HSNQ

1.Derejooyinka Ciidanka Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranku waxay u kala horreeyaan sida hoos ku xusan:
1) Dabley:
a) Layli Dable (L/D/le);
b) Dable (D/le); iyo
c) Alifle (A/le). 2) Saraakiil-xigeen:
a) Layli Sarkaal (L/Sarkaal);
b) Labo Alifle (L/A/le); iyo
c) Saddex Alifle (S/A/le). 3) Kormeereyaal:
a) Kormeere Koowaad;
b) Kormeere Labaad; iyo
c) Kormeere Saddexaad. 4) Saraakiil hoose:
a) Xidigle (X/le);
b) Labo Xidigle (L/X/le); iyo c)Dhamme/Kabtan. 5) Saraakiil sare:
a) Gaashaanle (G/le);
b) Gaashaanle Dhexe (G/dhexe); iyo c)Gaashaanle sare (G/sare). 6) Sarreeyeyaal:
a) Sarreeye Guuto (S/Guuto).
b) Sarreeye Gaas (S/Gaas); iyo
c) Sarreeye Guud (S/Guud).
2. Derejada ciidannimo waa xaq uu leeyahay xubinta ciidanka ah, waxa uuna ku lumin karaa oo keli ah, haddii looga xayuubiyo (qaado) si waafaqsan sharciga.

Qodobka 11aad
Dallacaadda Ciidanka HSNQ

1. Dallacsiinta Xubnaha Ciidanka HSNQ waxaa lagu salaynayaa ku-talo-galka miisaaniyad-sanadeedka ciidanka.
2.Dallacaadda Xubnaha Ciidanka HSNQ waxaa lagu bixinayaa; u bislaansho khibradeed ama aqooneed ama kartiyeed.
3.Muddada u bislaanshaha dallacaadda ee saraakiisha min derejo ilaa derejo waa sidasoo socoto:
a)Xiddigle ilaa Labo Xiddigle, waa muddo dhan 2 (labo) sano;
b)Labo Xiddigle ilaa Dhamme, waa muddo dhan 3 (saddex) sano;
c)Dhamme ilaa Gaashaanle, waa muddo dhan 4 (afar) sano;
d)Gaashaanle ilaa Gaashaanle Dhexe, waa muddo dhan 4 (afar) sano;
e)Gaashaanle Dhexe ilaa Gaashaanle Sare, waa muddo dhan 5 (shan) sano;
f)Gaashaanle Sare ilaa Sarreeye Guuto, waxay ku xiran tahay mudnaan iyodhismaha tirada ciidanka HSNQ;
g)Sarreeye Guuto ilaa Sarreeye Gaas, waxay ku xiran tahay mudnaan iyo dhismaha tirada ciidanka; iyo
h)Sarreeye Gaas ilaa Sarreeye Guud, waxay ku xiran tahay mudnaan iyo dhismaha tirada ciidanka.

4.Dallacaadda askarta waxaa soo jeedinaya xafiiska ciidanka asagoo raacaya xeer-hoosaadka Hay'adda ee khuseeya arrimaha dallacaadda, Talaiyaha Hay'adda ayaana wareegto ku soo saaraya.
5.Dallacaadda saraakiisha iyo saraakiil-xigeennada waxaa soo diyaarinaya xafiiska ciidanka asagoo tixraacaya buuxsamidda shuruudaha dallacaadda, kadibna Taliyaha Hay'adda ayaa maxdaxweynaha u soo jeedinaya oo xeer ku soo saaraya.
6.Saraakiisha mudanayaasha ah ee ka tirsan HSNQ, isla markaana aan marna derejo qaadan; waxaa loo tixgalinayaa, loona qiimaynayaa khibraddooda iyo shahaadadooda waxbarasho.

7.Dallacaadda Xubnaha Ciidanka iyo dhammaan arrimaha kale ee la xiriira waxaa loo maareynayaa si waafaqsan Sharciga HSNQ iyo Xeer- nidaamiyahan, ka dib markii uu dhaqan-gal noqdo.
8.Xeer-hoosaadka Hay'adda ayaa lagu qeexayaa habraaca iyo shuruudaha dallacaadda ciidanka iyo xubnaha HSNQ.

Qodobka 12aad
Faafinta Derejada Iyo Dallacaadda

Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ee si sharciga waafaqsan loo siiyo derejo ama loo dallacsiiyo; waxaa loo galinayaa faafinta HSNQ.

Qodobka 13aad
Sheegashada Derejo Been ah

Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ee si sharci darro ah u sheegta derejo ama billad ciidan oo uusan lahayn ama been abuura wareegto derejo-siin ah ama wax ka bedela dhammaanteed ama qeyb ka mid ah; waxa uu ku dhacay faldembiyeed, waxaana loo ciqaabayaa si waafaqsan sharciga Hay'adda iyo Xeerarka Ciqaabta Ciidammada.

Qodobka 14aad
Tababarrada Ciidanka HSNQ

1. Ciidanka HSNQ wuxuu yeelanayaa xarumo tababbar oo dabooli kara baahida tababbarrada ciidanka.
2. Tirada iyo tayada xarumaha tababbarrada waxaa jaan-goynaya Taliyaha HSNQ, iyadoo laga ambaqaadayo miisaaniyad sanadeedka HSNQ.
3. Manhajka tababbarka ciidanka HSNQ waxaa dejinaya Hoggaanka Tababarrada, iyadoo lagu salaynayo baahida shaqo ee ciidanka, waxaana fulinaya xarumaha tababbarrada ciidanka.
4. Si gaar ah, ciidanka u xilsaaran amniga xarumaha muhiimka ah iyo ilaalada gaarka ah, waxaa si joogto ah loogu tababarayaa xirfadaha iyo agabka casriga ah ee lama huraanka u ah waajib gudashadooda, si waafaqsan Qodobka 7aad
(11) ee Xeerka Amniga iyo Bad-qabka Xarumaha Dawladda.

Qodobka 15aad
Labbiska (Dirayska) Ciidanka

1. Haddii aan si kale loo sheegin, xubnaha Ciidanka HSNQ waxay xiranayaan marka ay shaqada ku jiraan labiska u cayiman, waxayna sidan karaan hub iyo rasaas waqtiga, meesha iyo sida loo amray.
2. Haddii qof ka tirsan ciidanka HSNQ loo oggolaado inuu xirto dharka rayidka waxaa ka reebban inuu la xirto qeyb ka mid ah diraysa ciidanka.
3. Ciidanka HSNQ xaaladaha loo oggolaaday xirashada dharka rayidka waxaa qabanaya Xeerka Asluubta (Dishibiliinka) Ciidanka, xataa markii ay ciidanku xiranyihiin dharka rayidka waa in ay u hoggaansamaan, xushmeeyaan, ayna salaamaan taliyeyaashooda iyo madaxda kale.
4. Xubnaha Ciidanka Hay'adda waa inay markasta hubiyaan nadaafadda labiskooda iyo in qalabka ciidan ee ay qaadanayaan uu yahay mid shaqaynaya oo aan cillad lahayn.
5. Xubintii ku guuldarreysata inay fuliso arrimaha ku xusan qodobkan, waxay mutaysanaysaa anshax-marin si waafaqsan Xeerka Anshaxa Hay'adda.

Qodobka 16aad
Hubka iyo Agabka Ciidanka

1. Xubin kasta oo ciidanka Hay'adda ka tirsan, hubka iyo agabka ciidan ee uu ku shaqaynayo waxuu noqonayaa mid ay Hay'addu bixisay oo ay dawladdu leedahay.
2. Xubnaha Ciidanka HSNQ waxaa ka reebban inay isticmaalaan qalab ciidan oo si gaar ah loo leeyahay marka ay ku jiraan shaqada loo idmaday.
3. Gaadiidka, hubka iyo dhammaan qalabka ciidan ee soo gala gacanta Hay'adda ee wali si fiican u shaqaynaya, isla markaana uu qof si shakhsi ah u leeyahay; Hay'adda ayaa la wareegaysa, wuxuuna noqonayaa hanti dawladeed, qofkii lahaana waa loo qiimaynayaa, haddiise hubku yahay mid cilladaysan ama hawlgab ah waa la baabi'inayaa.

Qodobka 17aad
Hoggaansanaanta Ciidanka

Waajibka ugu weyn ee ciidanku waa u hoggaansanaanta amarrada ciidan ee sida sharciga waafaqsan u soo fula, iyadoo loo gudanayo si Degdeg ah, si xushmad leh iyo si buuxda, sidaas darteed, lootaliyuhu waa inuu qaataa amarrada madaxdiisa, isagoo waxba ula kala harin tabartiisa iyo kartidiisaba.

Qodobka 18aad
Qaadasho Tallaabo Degdeg ah

1. Haddii qof Taliye ama Madax ah ay ku timaado ama la soo gudboonaato arrin degdeg ah oo uusan haysan amar ku aaddan, uuna u baahdo wax ka qabasho degdeg ah, isla markaana aan joogin meel uu ka weydiisan karo ama lagu siin karo amar ama aan fulin karin amar la siiyey xaaladda oo isbeddeshay awgeed; wuxuu qaadan karaa tallaabo degdeg ah oo waafaqsan xaaladda markaas taagan.
2. Xubbinta tallaabada degdegga ah qaadday si waafaqsan farqadda (1) ee Qodobkan, waa inay sida ugu dhaqsiyaha badan oo suuragal ah, oo aan ka badnayn toban iyo labo (12) saac gudahood, warbixinta tallaabada uu qaaday iyo sababta degdegga ka dhigtayba, ugu soo gudbiyaa madaxda ka sarraysa.

Qodobka 19aad
Adeegsiga Garaadaha Ciidanka

Qof kasta oo Ciidanka HSNQ ka tirsan, waa inuu garawsadaa ujeeddada garaadaha iyo amarka inay tahay inuu u adeegsado oo keli ah shaqada gudaheeda iyo danta ciidannimo.
Qodobka 20aad Bedelka iyo Eregta

1. Taliyaha HSNQ ayaaa bedeli kara Askarta Ciidanka HSNQ, isagoo tixgelinaya baahida shaqada iyo duruufaha gaarka ah ee xubin kasta, wuxuu sidoo kale oggolaan karaa askarta laga soo bedelayo ciidammada kale ee dawladda loona soo bedelayo ciidanka HSNQ.
2. Taliyaha ayaa sidoo kale, oggolaan kara eregta saraakiisha ka tirsan ciidanka HSNQ, markii ay soo codsato hay'ad dawladeed ama mas'uul ka tirsan dawladda.
3. Xubinta ku shaqeysa ereg ahaanta, waxay la mid tahay xubnaha kale ee haya shaqada Ciidanka HSNQ.

Qodobka 21aad
Waxyaabaha ka Reebban Ciidanka HSNQ

1. Xubnaha Ciidanka HSNQ, waxaa ka reebban inay qabtaan shaqo ka baxsan shaqada ciidanka ama shaqo kasta oo ka horimaanaysa tii loo xilsaaray ama loogu talagalay.
2. Qof kasta oo ciidanka HSNQ ka tirsan waxaa ka reebban ka mid noqoshada ururro siyaasadeed ama ururro qarsoodi ah.
3. Xubnaha Ciidanka HSNQ waxaa sidoo kale, ka reebban inay abaabulaan ama ay qeyb ka noqdaan bannaanbaxyo.
4. Xubnaha ciidanka Hay'adda waxaa ka reebban -haddii aysan helin oggolaansho- inay bixiyaan xog ama ay baraha bulshada ku faafiyaan arrimo shaqada Hay'adda khuseeya ama xambaarsan aragti siyaasadeed.
5. Xubnaha Hay'adda waxaa ka reebban inay aqbalaan ama qaataan hadiyad, manaafacaad ama wax faa'iido ah oo ka yimid shaqsiyaad, shirkado ama ururro xiriir shaqo la leh hawlaha Hay'adda.

Qodobka 22aad
Bandhig Codsi ama Cabasho iyo Habka Gudbinta

1. Qof kasta oo Ciidanka HSNQ ka tirsan, doonayana inuu soo bandhigto ama uu arrin la wadaago madaxda, waa inuu soo maraa heerarka talinta.
2. Qofkii madaxda u soo gudbiya codsi ama cabasho baalmarsan heerarka talinta; wuxuu ku dhacayaa gef asluubeed.
3. Dacwad kasta ama cabasho kasta waa inay ahaataa mid qof keli ah keensaday, waxaana reebban in si wadar ah loo soo gudbiyo.
4. Qof kasta oo Ciidanka HSNQ ka tirsan ee doonaya inuu cabasho ku soo hagaajiyo Taliye Cutub ama qof madax ah; waa inay ahaataa mid qoran, waana inay saxiixaan madaxda dhexe ee ay tahay in ay soo marto.
5. Qof madax ah ma diidi karo inuu xubinta cabashada qabta u saxiixo iyo inuu u gudbiyo madaxda ka sarraysa ee awoodda u leh cabasho uu soo qortay mid ka mid ah loo-taliyeyaashiisu, isla markaana, waa inuu raaciyaa aragtidiisa ama faalladiisa.

Qodobka 23aad
Ilaalinta Sirta iyo Agabka Ciidanka

1. Ciidanka HSNQ, waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo xifdinta wax kasta oo sir ciidan ah, isla markaana, waxaa ka reebban faafinta wararka iyo xogta ciidanka.
2. Sidoo kale, waa in ciidamadu si wanaagsan u xanaaneeyaan una daryeelaan hubka, agabka iyo alaabaha kale ee lagu aaminey.

Qodobka 24aad

Xilka iyo Mas'uuliyadda Ciidanka HSNQ

Markii laga soo tago mas'uuliyadda iyo waajibaadka ay ciidamada qalabka sida si guud ugu wada idman yihiin; Ciidanka HSNQ, waxay si gooni ah ugu xilsaaran yihiin inay soo gudbiyaan wixii xog ah oo ay helaan, si ay uga qeyb qaadato raadinta, xuuraaminta xogaha iyo wararka xaqiiqda ah, saadaalinta iyo dabagalka waxyaabaha waxtarka u leh sugidda amniga iyo xasilloonida amniga qaranka, la socoshada dhaqdhaqaaqyada cadawga, burburinta iyo ka hortagga shirqoollada iyo danaha cadawga dibadda iyo gudaha dalka IWM.

Qodobka 25aad
Dhowrista Dastuurka iyo Sharciyada Dalka

Ciidanka HSNQ, ka sokow inay u hogaansamaan ayna ilaaliyaan xeerarka iyo anshaxa ciidamada u degsan, waxaa saaran:

1) Inay dhawraan daacadna u noqdaan isla markaana ay difaacaan una hiiliyaan;

B. Dastuurka dalka.

T. Sarreynta sharciga iyo mabaadi'da asaasiga ah ee dawladnimada.

J. Ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo xuquuqda asaasiga ah, si waafaqsan qodobka 127aad faqradiisa (1) xarfaha (A, B iyo C) ee Dastuurka KG.

2) Inay ka dhawrasadaan ku-milmidda siyaasadda isla markaana ay dhexdhexaad ka noqdaan arrimaha siyaasadda, si waafaqsan Qodobka 127aad faqradiisa

(1) xarfka (E) ee Dastuurka KMG.

3) Dhanka kale, waxaa waajib ku ah oo saaran taliyeyaasha iyo madaxda ciidanka inay ciidamada ku tababaraan kuna wacyigeliyaan; dhaqangelinta dastuurka, sharciyada dalka ee kale iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaliya qeybta ka tahay, si waafaqsan 127 faqradiisa (1) xarfka (F) ee Dastuurka KG.

4) Sidoo kale, taliyeyaasha iyo madaxda Ciidanka HSNQ waa inay hubiyaan in xeerarka ciidamada iyo sharciyada kale ee dalka la dhawray laguna dhaqmey meelkasta iyo goorkastaba.

CUTUBKA SADDEXAAD SHAQADA IYO AWOODAHA HSNQ
Qodobka 26aad Xiriirka Arrimaha Dibadda

1. Iyadoo laga ambaqaadayo guud ahaan, ilaalinta danaha qaranka, gaar ahaan xaaladaha iyo dhacdooyinka waxtarka u leh ama liddiga ku ah amniga iyo xasilloonida qaranka, dalka gudihiisa iyo dibaddiisa; xiriirka arrimaha dibadda ee HSNQ wuxuu ku salaysnaanayaa hagaajinta iyo horumarinta xiriirradii horay u jiray iyo abuurista xiriirro cusub oo u adeegaya danaha amniga qaranka.
2. Istiraatiijiyadda iyo qorshaha xiriirka dibadda ee HSNQ waxaa jihaynaya Agaasimaha Guud (Taliyaha) HSNQ.
3. Taliyaha HSNQ wuxuu Madaxweynaha JFS la socodsiiyaa dhammaan xiriirrada iyo dhaqadhaqaaqyada waxtarka weyn u leh amniga iyo xasilloonida qaranka iyo dhammaan tallaabooyinka la qaaday si loo baajiyo khataro ku wajahan ama ku soo fool-leh amniga iyo xasilloonida Qaranka.

Qodobka 27aad
Wakiillada Hay'adda ee Dibadda

1. Hay'addu waxay ku yeelanaysaa dhammaan safaaradaha ay JFS ku leedahay dalalka kale, xil joogta ah oo ah La-taliyaha kowaad ee safaaradda ahna ku- xigeenka danjiraha, xilkaas oo ku xusan Qodobka 8aad, faqradiisa (1), xarafka (b) ee Sharciga Arrimaha Dibadda.
2. Wakiillada Hay'adda ee dibadda waxay u xilsaaran yihiin waajibaadka hoos ku xusan:

a) Waxay u xilsaaran yihiin waajibaadka La-taliyaha danjiraha ee ku xusan Qodobka 5aad ee sharciga arrimaha dibadda;

b) Wakiillada Hay'addu waxay si gaar ah ugu xilsaaran yihiin wakiilna Hay'adda uga yihiin; xuuraansiga arrimaha amniga iyo xasilloonida qaranka taabanaya ama waxtarka u leh ee dalalka ay joogaan iyo abuuridda, adkaynta iyo horumarinta iskaashiga, wax wada-qabsiga iyo xog is-dhaafsiga iyo xiriirka HSNQ kala dhaxeeya Hay'adaha dhiggeeda ah.

3. Wakiillada Hay'adda waxay yeelanayaan derejada iyo mudanaanta ku xusan Qodabada 8, 9 iyo 13 ee sharciga arrimaha dibadda waxayna u madaxbannaan yihiin gudashada waajibaadkooda shaqo, si waafaqsan Qodobka 10aad ee isla sharciga kor ku xusan.
4. Qofka loo magacaabayo xilka faqrada 1aad ee Qodobkan ku xusan waa inuu buuxiyo shuruudaha soo socda:

a) Waa inuu haystaa ugu yaraan shahaado jaamacadeed oo ay bixisay jaamacad la aqoonsan yahay;

b) Waa inuu leeyahay waayo-aragnimo shaqo oo aan ka yarayn shan (5) sano lana xariirta hawlaha Hay'adda ama arrimaha diblomaasiyadda.

5. Taliyaha Hay'adda ayaa soo xulaya wakiillada Hay'adda ee dibadda, ka dibna wuxuu u gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha oo asana dhankiisa u sii gudbinaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda si uu xilka ugu magacaabo.
6. Magacaabista wakiillada Hay'adda kadib, Hay'addu waxay ku wargelinaysaa Hay'adaha dhiggeeda ah ee dalalka wakiillada loo magacaabay.

Qodobka 28aad

Ku Meelaynta Xubnaha Hay'adda Laamaha Kale ee Dawladda

1. HSNQ waxay xubnaheeda qaar ka mid ah ku meelayn kartaa wasaaradaha, wakaaladaha iyo laamaha kala duwan ee dawladda, hay'adaha dawladda waa inay oggolaadaan meeleyntaas si dahsoon ama si daahfuran tii ay noqotaba, si waafaqsan qorshaho-hawleedka Hay'adda iyo siyaasadda guud ee amniga qaranka.
2. Xubnaha ka tirsan HSNQ ee lagu meeleeyo laamaha kale ee Dawladda; waxay xogaha la soo wadaagayaan xafiiska ay ka tirsan yihiin ama cidii kale ee loo cayimo.
3. Xubnaha ku meelaysan laamaha kale ee dawladda si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan; haddii hay'adaha ay ku meelaysan yihiin ka qaataan gunno; waxay xaq u yeelanayaan mushaarka ay Hay'adda ku lahaayeen.
4. Xubnaha ku meelaysan laamaha kale ee dawladda waxaa qabanaya sharciga iyo xeerarka HSNQ.

Qodobka 29aad

Amniga Xarumaha Dawladda

1. HSNQ iyadoo gudaneysa waajibaadkeeda shaqo, waxay amniga xarumaheeda iyo xarumaha kale ee ay amnigooda u xilsaaran tahayba u sugaysaa si waafaqsan Qodobada Xeerka Amniga iyo Badqabka Xarumaha Dawladda iyo Habraacyada amniga ee HSNQ.
2. Dhammaan xarumaha dawladda waxaa ka hawlgelaya xubno ka tirsan HSNQ oo ay shaqadoodu noqoneyso aruurinta xogaha daahsoon ee khuseeya amniga iyo dhaqdhaqaaqa xarumaha iyo ku gacan-siinta boliiska gudashada waajibaadkooda, si waafaqsan Qodobka 5aad, faqradiisa (3) ee Xeerka Amniga iyo Badqabka Xarumaha Dawladda.
3. Hay'addu waa inay nuqullo ka haysato MAP-ka xarumaha Dawladda ee muhiimka ah oo si dhamaystiran u muujinaya marinada, iridaha, dhismaha gudaha, jaranjarooyinka, iridaha danbe, xeyndaabka guud iyo wax kasta oo aan looga maarmin gurmadka iyo hawlgallada amni, si waafaqsan Qodobka 9aad, faqradaha (7) iyo (8) ee Xeerka Amniga iyo Bad-qadbka Xarumaha Dawladda.

Qodobka 30aad

Maamulka iyo Jiheynta Amniga Hoteellada iyo Goobaha Ganacsiga

HSNQ ayaa masuul ka ah qiimaynta, la socodka, baarista iyo jiheynta hawlaha sugidda amniga hoteellada, goobaha ganacsiga iyo xarumaha adeegga bulshada, si waafaqsan Qodobada Xeerka Amniga Hoteelada, Goobaha Ganacsiga iyo Xarumaha Adeegga Bulshada, gaar ahaan, Qodobka 5aad, faqradaha (5-12) iyo Qodobka 10aad, faqradda (7).

Qodobka 31aad

Daryeelka Xubnaha Hay'adda

1. Guud ahaan, xubnaha HSNQ waxay yeelanayaan daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah, gaar ahaan xubnaha ciidanka ee ku dhaawacma ama ku waxyeelooba hawlgallada iyo shaqada joogtada ah ee HSNQ waana inay helaan daryeel caafimaad oo dhammaystiran, si waafaqsan XH-HSNQ.
2. Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ee geeriyoota iyadoo ku jirta hawlgal ama gudanaysa waajibaadkeeda shaqo; ehelladeedu waxay xaq u yeelanayaan:

a) In duug samir-siin ah la siiyo;
b) In la siiyo saldhigga mushaarkiisa;
c) Ehellada xaqa sare ku xusan yeelan kara waa: caruurtiisa iyo xaaskiisa haddii ay jiraan, haddii kalana labadiisa waalid oo keli ah;
d) Xubin kasta oo la xaqiijiyay inuu geeriyooday asagoo ku jira hawl baalmarsan sharciga iyo shaqada HSNQ; xuquuqda qodobkan ku xusan ma yeelanayo.

Qodobka 32aad

Adeegyada Gurmadka Degdegga Ah

Hay'addu waxay yeelanaysaa keyd caafimaad oo ku filan gargaarka degdegga ah, gaadiidka gurmadka degdegga ee caafimaadka iyo dabdamisyo u gaar ah iyo shaqaale u tababaran gargaarka degdegga ah oo si joogto ah u hawlgala, si waafaqsan Qodobka 9aad, faqradaha (1) iyo (2) ee Xeerka Amniga Xarumaha Dawladda.

Qodobka 33aad

Qaadashada Aqoonsiyo Kala Duwan

1. Xubnaha HSNQ waxay adeegsan karaan magacyo, aqoonsiyo iyo baasaboorro kala duwan xilliyada ay gudanayaan waajibaadkooda shaqo, ka dib oggolaanshaha AG ee Hay'adda.

2. Xubinta ka tirsan Hay'adda ama dan shaqo kala dhaxeyso ee AG ee HSNQ u arko in la siiyo baasaboor diblomaasi ah baahi shaqo darteed ama xeer- hoosaadka Hay'addu tilmaamo, waa la siinayaa, waxuuna yeelanayaa xasaanadda iyo habmaamuuska diblomaasiyiinta mid la mid ah.

3. Hannaanka bixinta baasaboorka diblomaasiga ah iyo Xubnaha loo oggolaan karo; waxaa loo raacayaa XH-HSNQ.

Qodobka 34aad
Barnaamijyada ku Mataaneysan HSNQ

1. Waxaa jiraya barnaamijyo qaran oo ku mataaneysan HSNQ, isla markaana hoos imaanaya AG ee HSNQ, waxaase si toos ah u maamulaya agaasime u gaar barnaamij qaran ee kasta.
2. Barnaamijyada qaran ee ku mataaneysan HSNQ waxaa ka mid ah:
a) Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga: oo ah hay'ad tacliin sare oo takhasusi ah, una gaar ah tacliinta sare, tababarrada, iyo cilmibaarista khuseysa amniga;
b) Xarunta Irshaad ee ka hortagga xag-jirnimada: oo ah xarun u xilsaaran daraasaadka, wacyigelinta iyo barnaamijyada ka hortagga arrimaha la xiriira afkaarta argagixisada;
c) Madbacadda Amniga Qaranka: oo ah barnaamij qaran oo u xilsaaran daabicidda ama soosaaridda buugta, aqoonsiyada, qoraallada iyo dhammaan xogaha loo diyaariyay hab cilmiyaysan, isla markaana muudnaanta iyo hortabinta u leh Qaranka Soomaaliyeed;
d) Xarunta Qaranka ee Kaydinta Xogaha: oo ah xarun lagu kulmiyo, lagu keydiyo, lagu ilaaliyo, lagana maareeyo xogaha qaranka;
e) Mid kasta oo ka mid ah barnaamijyada qaran ee faqraddan ku xusan wuxuu yeelanayaa Xeer-nidaamiye u gaar ah.
3. Barnaamijyada qaran ee ku xusan Qodobkan waxay yeelanayaan madax miisaaniyadeed gooni ah oo ka mid ah miisaaniyadda HSNQ.

Qodobka 35aad
Hubinta Ajaanibta

1. HSNQ waxay hubin amni ku samaynaysaa lana soconaysaa shaqada iyo shaqaalaha hay'adaha iyo shirkadaha ajnabiga ah, waxay sidoo kale, hubin amni ku samaynaysaa Ajaanibta qaadanaya dal-ku-galka, deganaashaha, iyo jinsiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Qodobka 8aad, faqradihiisa (11) iyo (12) ee Sharciga HSNQ;
2. Qof Ajanabi ah oo aan la marsiin hubinta amni ee Hay'adda lama siin karo dal- ku-gal, deganaasho iyo jinsiyad midna;

3. Hay'addu waxay martida sida gaarka ah ugu socota ama ay maamuleyso siin kartaa mudnaan iyo maamuus gooni ah oo daahsoon.

Qodobka 36aad
Kaaliyaha Noqonaya Sii-hayaha ama Ku-simaha Xilka AG

1. Markii uu bannaanaado sabab ay ahaataba xilka iyo xafiiska Agaasimaha Guud ee HSNQ, si waafaqsan Qodobka 14aad, faqradiisa (2) ee Sharciga HSNQ; Kaaliyaha sii-hayaha noqonaya waxaa go'aaminaya Golaha Wasiirrada JFS.
2. Kaaliyaha sii-haye u noqda si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan, waxaa ka reebban dhammaan arrimaha ku xusan Qodobka 13 ee sharciga HSNQ, waxaana saaran inuu xilka u wareejiyo si waafaqsan Qodobka 43aad, faqraddiisa (4).
3. Markii Taliyaha Hay'addu dalka dibaddisa aadayo, wuxuu ku-sime ka dhigan karaa mid ka mid ah Kaaliyeyaashiisa.
4. Taliyaha Hay'adda waxaa u furan inuu qaar awoodihiisa ka mid ah, si joogta ah ama si ku-meelgaar ah, ugu xilsaarto kaaliyaashiisa ama saraakiisha kale ee Hay'adda, si waafaqsan Qodobka 12aad (9) ee Sharciga HSNQ.

CUTUBKA AFARAAD NIDAAMKA XARUMAHA BAARISTA HSNQ

Qodobka 37aad
Hannaanka Baarista Dembiyada

1. Hannaanka baarista dembiyada HSNQ waxaa la waafajinayaa Qodobka 35aad ee Dastuurka KMG, Qodobbada Sharciga HSNQ, Sharciga La- dagaallanka Argagixisada iyo Xeer-nidaamiyahan.
2. Arrimaha khuseeya nidaamka xabsiyada iyo maareynta maxaabiista HSNQ ee aan laga helin sharciyada iyo xeerarka faqradda sare ku xusan waxaa loogu noqonayaa Qodobbada ka khuseeya Xeerka Xabsiyada iyo Xeer- nidaamiyaha Xabsiyada dalka.
3. Baarista Hay'adda waxaa loo dhammeystirayaa dhammaan agabka iyo wadiiqooyinka casriga ah ee fududayn kara helidda caddaymaha dembiga iyo dembiilaha.
4. Habka maamulka iyo maaraynta kiisaska iyo maxaabiista iyo guud ahaan Faahfaahinta nidaamka baarista dembiyada HSNQ; waxaa loo raacayaa si waafaqsan Habraaca Baarista Dembiyada ee HSNQ.

Qodobka 38aad
Mas'uuliyadda Taliyaha Baarista

1. Taliyaha baarista HSNQ isagoo ka wakiil ah Taliyaha Guud ee HSNQ; wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha soo socda, si waafaqsan xeerka:
a) ilaalinta iyo dhaqangelinta xeerarka iyo habraacyada arrimaha khuseeya xarumaha baarista Hay'adda, maxaabiista iyo nidaamka baarista.
b) Maamulka iyo maaraynta dhammaan xarumaha baarista HSNQ ee maxaabiista lagu hayo, xarumahaas oo ku xusan Qodobka 49aad ee sharciga HSNQ.
c) Bad-qabka iyo xifdinta hantida, agabka iyo dhammaan qalabka loogu talagalay in loo adeegsado danaha baarista ama dembi lagu galay ama ay maxaabiistu leeyihiin.
d) Ka hortagga wax allaale wixii halis gelin kara daryeelka iyo caafimaadka maxaabiista.
2. Taliyaha baarista HSNQ wuxuu leeyahay awood iyo mas'uuliyad u dhiganta tan Taliyaha guud ee ilaalada xabsiyada dalka, si waafaqsan Xeerka Xabsiyada iyo Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada dalka.

Qodobka 39aad
Ciidanka Ilaalada Xarumaha Baarista

1. Xarumaha baarista HSNQ waxaa ka hawlgelaya ciidan ka tirsan HSNQ oo si gaar ah ugu xilsaaran maaraynta goobaha dembiyada aragagixisadu ka dhacaan iyo ilaalinta xarumaha baarista HSNQ.
2. Xubnaha ciidanka HSNQ ee u xilsaaran ilaalada xarumaha baarista Hay'adda, maxaabiista iyo nidaamkooda; waxay yeelanayaan awoodaha iyo waajibaadka ay leeyihiin xubnaha ilaalada xabsiyada dalka oo kale, ee ku xusan Xeerka Xabsiyada iyo Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada dalka.
3.Ciidanka ilaalada ee ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan, marka ay gudanayaan waajibaadkooda ku aaddan ilaalada xarumaha baarista, maxaabiista Hay'adda iyo maaraynta goobaha dembiyada; waxay hoos tagayaan kuna shaqaynayaan amarrada, jihaynta iyo farriimaha Taliyaha baarista Hay'adda,

Qodobka 40aad
Mas'uuliyadda Xeer-ilaalinta Guud ee CQS

Xeer-ilaaliyaha guud ee CQS iyo wakiilladiisu, waxay xarumaha baarista HSNQ u kormeeri karaan si waafaqsan Qodobka 37aad, faqradiisa (8) ee Sharciga HSNQ.

Qodobka 41aad
Booqashada iyo Kormeerka Taliyaha Hay'adda

Taliyaha HSNQ wuxuu si shakhsi ah -ugu yaraan sanadkiiba mar- booqasho iyo kormeer ku samaynayaa dhammaan xarumaha baarista HSNQ ee dadka lagu hayo, si uu ugu kuurgalo una ogaado xaaladaha iyo baahiyaha dhabta ah ee ka jira xarumaha baarista ama ay maxaabiistu qabaan, isla markaana uu qaado tallaabada ku habboon.

Qodobka 42aad
Kala Saaridda Xabsiyada iyo Maxaabiista

Si looga baaqsado ama looga hortago intii suuragal ah halista ka dhalan karta in maxaabiistu isku gudbiso afkaar ama anshax aan wanaagsanayn, loona hirgeliyo dhaqanka wanaagsan iyo daryeelka nabadgelyada, waxaa maxaabiista loo kala saarayaa sida soo socota:
1) Maxaabiista loo soo xiray tuhun argagixiso ama loo haysto dembiyada ku xusan Sharciga La-dagaallanka Argagixisada; waxaa lagu haynayaa meel ka gooni ah maxaabiista kale ee laga soo xirey ciidamada.
2) Maxaabiista ku eedaysan dembiyada waaweyn ee ciqaabtoodu gaarayso toban
(10) sano oo xabsi ah iyo ka sii badan; waxaa lagu haynayaa meel ka duwan meelaha lagu hayo maxaabiista kale ee loo haysto tuhun ama dembi yar.
3) Saraakiisha laga soo xiro ciidanka ee aan ku eedaysneyn wax la xiriira argagixiso waxaa lagu haynayaa meeshii suuragal ah iyo si ka duwan maxaabiista kale ee askarta ah.

4) Haweenka ku jira gacanta Hay'adda waxaa lagu haynayaa qeyb ka gooni ah qeybaha maxaabiista ragga ah ay ku jiraan oo leh ilaalo hoosaad dumar ah, isla markaana u xilsaaran nidaamintooda iyo daryeelkooda, waxaana loola dhaqmayaa si waafaqsan Qodobka 37aad (5) ee Sharciga HSNQ.
5) HSNQ waxay la soconaysaa, dabagal iyo qiimayna ku samaynaysaa dhammaan xubnaha ku xukuman fal argagixisinimo ama afkaar iyo caqiido argagixiso inta ay xabsiga ku jiraan iyo kadib marka muddada xukunka ay dhammaystaanba.

Qodobka 43aad
Xuquuqda Dadka Ay Hay'addu Hayso

Eedaysanayaasha ku jira xarumaha baarista Hay'adda ama la soo qabto, waxay leeyihiin xuquuqda ku xusan Qodobka 35aad ee Dastuurka KMG, Qodobbada Sharciga HSNQ gaar ahaan Qodobka 37aad iyo Qodobka 39aad, Qodobada Sharciga La-dagaallanka Argagixisada iyo sharciyada kale ee dalka.

Qodobka 44aad
Fatashaadda Maxaabiista

Maxbuus kasta markii uu xabsiga soo gelayo iyo xilli kasta oo kale oo Taliyaha baaristu u arko, waxaa lagu sameynayaa fatashaad, isla markaana maxaabiista waxaa laga reebayaa ama laga qaadayaa waxyaabaha mamnuuca ah ee lagu helo.

Qodobka 45aad
Hantida Iyo Alaabta Maxaabiista

1. Wixii hanti ah ama alaab kale ah oo waxtar leh ee laga helo maxbuuska, isla markaana aan ahayn mid dembi lagu galay ama la tuhunsan yahay in dembi lagu galay; maxbuuska waa loo haynayaa waana loo xifdinayaa, haddii uu codsado in ehelladiisa ama asxaabtiisa loogu dhiibana Taliyaha baarista ama ciddii kale ee uu wakiisho ayaa go'aan ka gaari kara.
2. Wixii alaabo ah oo maxbuuska laga helo, haddii ay tahay mid aad duug u ah ama aan dhigmi karin ama loo arko in ay cudurro faafin karaan; waxaa la amrayaa in la baabi'iyo, maxabuuskana waa lagu wargelinayaa, wax magdhow ahna ma yeelanayo, sida ku xusan Qodobka 20aad ee Xeerka Xabsiyada iyo Qodobka 14aad ee Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada dalka.

Qodobka 46
Nadaafadda Xarumaha Baarista

1. Si loo dhawro nadaafadda guud ee xarumaha baarista Hay'adda waa in qolalka ama hoolalka maxaabiista lagu hayo ay yeeshaan musqulo ku filan, waana in nadaafadda xabsiyada la ilaaliyo, gaar ahaan qololka jiifka, musqulaha iyo jikooyinka.
2. 2. Maxbuus kasta waxaa xil ka saran yahay nadaafadda iyo daryeelka jirkiisa, gogoshiisa, dharkiisa, weelasha uu wax ku cuno iyo dhammaan alaabaha uu adeegsado.
3. Qololka iyo hoolalka maxaabiista lagu hayo waa in xilli ka mid ah maalinta inteeda hore irdaha iyo dariishadaha loo furo, si ay maxaabiistu u qoraxaystaan ama ay hawo nadiif ah u qaataan.

Qodobka 47aad
Nolosha Iyo Daryeelka Maxaabiista

1. Maxbuus kasta ee gacanta Hay'adda ku jira, wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garaan cunto ah oo uu ku baahi beeli karo iyo biyo uu cabo oo ku habboon, si waafaqsan xeer-hoosaadka Hay'adda.
2. Maxaabiista waxaa loo oggolaan karaa in xilliyada qaar cunto bannaanka looga keeno, iyadoo laga ambaqaadayo talooyinka dhaqtarka ama xaalad kale.
3. Maxaabiista waxaa la siinayaa gogol (firaash) ku habboon oo awoodda dhaqaale ay saamaxayso.
4. Huga (dharka) xabsiyadu waa in uusan noqon mid qofnimada maxbuuska waxyeelayn kara ama hoos u dhigi kara, waana in ugu yaraan todobaadkiiba mar la dhaqo.
5. Meeshii iyo markii ay suuragal tahay maxaabiista waa in fursad loo siiyo inay qubeystaan ugu yaraan todobaadkiiba labo mar iyo markasta oo ay waajib tahay, si kastaba, maxaabiistu waa inay korkooda (oogadooda) nadiifiyaan lana siiyo biyo iyo saabuun hadba sida awooddu tahay.
6. Dhammaan maxaabiista kuwa caafimaad darro darteed looga reebay ma ahee, waa inay helaan jimicsi hadba sida uu ku taliyo Taliyaha baaristu.
7. Dhanka kale, wax kasta oo meel ka baxsan xabsiga looga keeno maxaabiista waa in si dhamaystiran loo baaro.

Qodobka 48aad
Booqashada iyo Xiriirka Ehellada Maxaabiista

1. Ehellada maxaabiista waxaa loo oggolaanayaa inay soo booqdaan ama inay maxaabiistu la xiriiraan ehelladooda iyo ciddii kale oo loo arko waqtiga iyo sida loo cayimo, si waafaqsan Qodobka 37aad, faqradaha (1) iyo (6) ee Sharciga HSNQ.
2. Marka kasta oo maxbuuska ehelladiisa ama ciddii kale ee loo oggolaado ay soo booqanayaan ama ay la xiriirayaan waa inuu goob-joog ahaado xubin ka tirsan saraakiisha baarista Hay'adda.

Qodobka 49aad
Cabashada Maxaabiista

Maxbuus kasta oo xarumaha baarista Hay'adda ku jira, wuxuu xaq u leeyahay inuu si keli ah cabasho ama ashtako ugu soo gudbisto Taliyaha baarista Hay'adda ama ciddii kale ee Xeerku oggol yahay.

Qodobka 50aad
Daryeelka Bukaannada iyo Takoorka Maxaabiista Qaba Cudurrada Faafa

1. Bukaannada maxaabiista waxaa la siinayaa daryeel caafimaad intii suuragal ah.
2. Maxaabiista qaba ama laga helo cudurrada faafa, waxaa loo sameynayaa meel gaar ah oo lagu takooro, si looga hortago in cudurku ku faafo maxaabiista kale ama hawlwadeenada xarumaha baarista.
3. Maxaabiista qaba ama uu ku dhaco cudur halis ah; Taliyaha baaristu wuxuu u oggalaan karaa in lagu daweeyo isbitaal ka baxsan daryeelka caafimaadka Hay'adda, markii uu sidaas dhaqtarku ku taliyo ama ay xaalad Degdeg ah jirto.
4. Bukaannada maxaabiista ee loo oggolaado in lagu daweeyo isbitaal Hay'adda ka baxsan, si waafqasan faqradda saddexaad (3) ee Qodobkan; waa in Taliyaha baaristu qaado tallaabooyinka iyo wadiiqooyinka lama huraanka ah si looga hortago fakashada maxbuuska ama inuu xog ka helo ama u gudbiyo cid kale.

Qodobka 51aad
Adeegsiga Xoogga

1. Ciidanka u xilsaaran ilaalada xarumaha baarista iyo maxaabiista Hay'adda waxaa ka reebban adeegsiga xoog aan loo baahnayn, haddii loo baahdo isticmaalka xoog, waa in ujeeddadiisu ku kooban tahay daryeelka, xasillinta iyo nabadgalyada maxaabiista iyo xarumaha baarista Hay'adda.
2. Ciidamada faqradda (1) ee Qodobkan ku xusan, markii ay waajibaadkooda shaqo gudanayaan waxaa ka reebban inay maxaabiista kula kacaan ama kula dhaqmaan anshax-xumo, daandaansi, awood sheegasho iyo xadgudb kasta oo bani-aadannimada ka baxsan.
3. Ciidanka ilaalada xarumaha baarista iyo maxaabiista Hay'adda waxaa u furan in ay awood adeegsadaan markii ay lama huraan noqoto, si maxbuuska loogu soo dabbaalo ilaalinta nidaamka iyo kala dambaynta.
4. Ciidanka ilaalada ee faqradda (1) ee Qodobkaan ku xusan markii ay hub u adeegsanayaan maxbuus fakaday ama iskudayay inuu fakado ama awood adeegsaday; waa in aysan hub adeegsan ilaa ay ka xaqiijiyaan in aysan heli karin wadiiqad kale, isla markaana waa in aysan xabad ku ridin ayagoon maxbuuska u digin ama ku wargelin inay xabad ku ridi doonaan.
5. Waxaa waajib ah markii hub la adeegsanayo in lagu ekaado ama aan la gudbin hadba inta baahidu tahay.
6. Xaaladaha hubka la adeegsan karo waa kuwa ku xusan Qodobka 44aad (3) ee Xeerka Xabsiyada.
7. Haddii awoodda la adeegsaday ay keento ama ay sababto waxyeello daran ama waxa la adeegsaday uu yahay hub; Taliyaha baarista waxaa saaran in si aan daahid lahayn baaris ugu sameeyo dhacdada, waxa sababay iyo dhammaan duruufaha ku xeeran, ka dibna uu la wadaago Taliyaha Guud ee Hay'adda iyo hay'adaha Garsoorka ee awoodda u leh.

Qodobka 52aad
Dembiyada Xabsiyada

1. Maxbuus kasta ee la yimaada ama ku dhaca mid ka mid ah arrimaha ku xusan Qodobka 47aad ee Xeerka Xabsiyada; waxaa loo aqoonsanayaa qof ku dhacay mid ka mid ah dembiyada yar-yar ee xabsiyada.
2. Maxbuuskii ku dhaca ama la yimaada mid ka mid ah arrimaha ku xusan Qodobka 48aad ee Xeerka xabsiyada, asna waxaa loo aqoonsanayaa qof ku dhacay dembiyada waaweyn ee xabsiyada.

Qodobka 53aad
Anshax-marinta Maxaabiista

1. Markii uu maxbuus ku dhaco mid ka mid ah dembiyada xabsiyada, Taliyaha baaristu wuxuu qaadayaa tallaabooyinka soo socda:
a) Wuxuu amrayaa in maxbuuska eedda loo haysto kaligiis lagu xiro meel ka gooni ah maxaabiista kale;
b) In si degdeg ah oo aan daahid lahayn loo baaro isla markaana la aruuriyo caddaymaha ku aaddan eedda loo soo jeediyey maxbuuska, ka dibna waxaa laga diyaarinayaa warbixin lagu go'aan qaadan karo;
c) Maxbuuska waxaa lagu wargelinayaa eedda loo haysto, waxuuna xaq u leeyahay in fursad loo siiyo inuu iska difaaco eedda;
2. Maxbuuskii ku dhaca mid ama ka badan oo ka mid ah dembiyada xabsiyada; Taliyaha baarista wuxuu u anshax-marin karaa si waafaqsan Qodobka 50aad iyo 51aad ee Xeerka Xabsiyada.
3. Anshax-marinta maxaabiista haweenka ah, waxaa loo xilsaarayaa Askar haween ah.
4. Maxbuuskii ku dhaca dembiyada xabsiyada ee ku xusan Qodobka 52aad ee Xeer- nidaamiyahan, lagama qaadi karo tillaabo anshax-marin ah oo aan waafaqsanayn xeerka.

Qodobka 54aad
Dhimashada Maxbuuska

Haddii qof maxaabiista ka mid ah uu geeriyoodo waa in sida ugu dhaqsiyaha badan lagu wargeliyo dhinacyada soo socda:
1.Hay'adda Garsoor ee awoodda u leh;
2.Ehellada ugu dhaw ee maxbuuska geeriyoodey.
3.Waxaa baaritaan dhammeystiran lagu sameynayaa sababta dhimashada maxbuuska, si Taliyaha HSNQ loogu Gudbiyo warbixin uu ku go'aan qaadan karo.

Qodobka 55aad
Xarumaha Dhaqancelinta Xubnaha Argagixisada

1. Xarumaha dhaqancelinta ujeeddadooda waxaa ka mid ah:
a) In barnaamijyada xarumaha dhaqancelinta xubnaha argagixisada ay yeeshaan, tiirar iyo qeybo kala duwan oo isku xiran, isla markaana isugu jira dhaqancelin, wacyigelin diini ah, waxbarasho, anshaxcelin, xog helid iyo dib ula falgal bulsho.
b) In xubnaha kasoo goosta ama iska soo dhiiba kooxaha iyo ururada argagixisannimada ku astaysan ee ku xusan lifaaqa 1aad ee Sharciga La- dagaallanka Argagixisada ama sheegta inay ka soo laabteen afkaarta xagjirnimada; loo diyaariyo inay bulshada dib ula falgalaan, isla markaana ay ehelladooda dib ula midoobaan, ka dib markii hubin amni iyo dhaqancelin lagu sameeyo;
c) In laga wacyigeliyo lagana tirtiro afkaarta xagjirka ah ee maankooda ku tallaalantay;
d) In xubnaha kale ee kooxaha argagixisada ku maqan, lagu dhiirageliyo inay iskood isku soo dhiibaan ama ay argagixisada uga soo baxaan.
2. Dhammaan xarumaha iyo barnaamijyada dhaqancelinta xubnaha argagixisada ee dalka ka jira, waxay hoos tagayaan HSNQ, Hay'adda ayaana jihaynaysa, isla markaana dajinaysa istiraatiijiyada iyo siyaasadda waddaniga ah ee barnaamijyada xarumaha lagu dhaqacanceliyo laguna wacyigeliyo xubnaha ka soo noqda ama kasoo goosta argagixisada.
3. Xarumaha faqradda (1) ee Qodobkan ku xusan, waxaa ka hawlgelaya dad aqoon iyo waaya-aragnimo u leh qaabka wacyigelinta xagjirnimada iyo ka hortagga afkaarta argagixisada, kana soo saari kara xogaha waxtarka u leh amniga qaranka, isla markaan akhrin kara nafsiyaadka xubnaha iyo heerarka khatartooda.
4. Xubnaha la dhaqancelinayo ee ka yimaada kooxaha ama ururrada argagixisada waa inay xarumaha dhaqancelinta ku jirayaan ugu yaraan hal sano, ka hor inta aan bulshada dib loogu celin.

5. Xubnaha kasoo baxa kooxaha argagixisada markii ay dhammeystaan barnaamijyada dhaqancelinta ah ee loogu talagalay, ka hor inta aan bulshada dib loogu celin; waa in qiimayn amni lagu sameeyo heerka halistooda.
6. Xeer-ilaalinta CQS, waa inay baarista Hay'adda la soo wadaagto dhammaan magacayada xubnaha aragagixisada ee xukunku ku dhacay.
7. Hay'addu waxay la soconaysaa, kor-joogtaynaysaa, ka warqabaysaa, isla markaana ay qiimaynaysaa dhammaan xubnaha ku saamoobay afkaarta argagixisada ee ay u dhammaatay muddada dhaqancelinta.
8. Barnaamijyada dhaqancelinta isa-soo dhiibayaasha, si ay u noqdaan kuwa boqolkiiba boqol (100%) ku salaysan danta iyo qorshaha Qaranka; waa in Xukuumaddu u qoondayso madax miisaaniyeed u gaar ah maamulka iyo maaraynta barnaamiyada iyo xarumaha dhaqancelinta isa-soo dhiibayaasha oo ka mid ah miisaaniyadda guud ee HSNQ, si looga maarmo faragalinta taban ee ka imaan karta hay'adaha deeqaha-bixiya iyo fulinta qandaraasyada faa'iidada iyo danta aan u ahayn barnaamijyada dhaqancelinta.
9. Wixii faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan hannaanka maaraynta iyo maamulka xubnaha isa-soo dhiibayaasha iyo xarumaha dhaqancelinta waxaa loo raacayaa, si waafaqsan Habraaca diiwaangeinta iyo dhaqancelinta isa-soo dhiibayaasha HSNQ.

CUTUBKA SHANAAD
DHISMAHA IYO NIDAAMINTA GUDDIGA ANSHAX- MARINTA EE HSNQ

Qodobka 56aad
Xeerinta Anshax-marinta Xubnaha Hay'adda

Si waafaqsan Qodobka 33aad ee sharciga HSNQ xubin kasta ee ka tirsan ciidanka HSNQ oo ku dhaca fal liddi ku ah ama wax u dhimaya anshaxa iyo dhaqanka ciidannimo, waxaa anshax-marinaya Guddi Anshax-marin oo ay Hay'addu yeelaneyso iyadoo loo cuskanayo Qodobada anshax-marineed ee XN-HSNQ tilmaamayo.

Qodobka 57aad
Qaab-dhismeedka Guddiga Anshax-marinta

1. Guddiga Anshax-marinta Hay’addu wuxuu ka koobnaanayaa todoba (7) xubnood oo kala ah sida soo socota:

a) Kaaliyaha Amniga Hay’adda == (Guddoomiye).
b) Agaasimaha Baarista Hay’adda ======== (Xubin).
c) Agaasimaha dabagalka ======== (xubin).
d) Agaasimaha Waaxda Maamulka Ciidanka ======== (Xubin).
e) Saddex (3) sarkaal oo sare ======== (Xubno).

2. Tirada Guddiga Anshax-marinta ee faqradda (1) qodobkan ku xusan; Taliyaha Hay’addu wuxuu ku dari karaa (ku kabi karaa) qof ama labo kale markii ay la hobboonaato, xubnaha kabka ah waxay yeelanayaan cod la mid ah kan xubnaha asalka ah, hase ahaatee, markii xubno dheeri ah guddiga lagu kabayo, waxaa lagu dadaalayaa in tirada guddigu ahaato kinsi (hal-dheeri).
3. Guddoomiyaha guddiga marka uu maqan yahay ama uuna ka soo qeyb geli karin kulannada guddiga, sabab kasta oo ay tahay, waxaa kaalintiisa buuxinaya Taliyaha Baarista Hay’adda.

Qodobka 58aad
Guntanka (Kooramka) iyo Habka Go’aannada Guddiga Anshax-marinta

1) Markii eeddu tahay mid culus kooramka guddigu wuxuu ku guntami karaa inay ka soo qeyb-galaan dhammaan xubnaha guddiga ee todobada (7) xubnood ah iyo xubnihii kale ee Taliyuhu ku kabo, marka ay eeddu tahay mid fudud, waxuu kooramku ku guntami karaa shan (5) xubnood iyo xubnaha kabka ah haddii ay jiraan.
2) Go’aannada Guddigu waxay kusoo baxayaan si aqlabiyad ah (cod hal dheeri ah: 50+1).
3) Haddii tirada codadku noqdaan kuwa siman, waxaa la raacayaa hadba dhanka uu guddoomiyaha Guddigu jiro.
4) Go’aan kasta oo Guddiga ka soo baxa waxuu noqonayaa mid la sababeeyey, ka dib markii baaris iyo xaqiijin ku filan ay Guddigu sameeyaan.
5) Gudiga Anshax-marintu kiisaska dabeecadda ciqaabta ah leh; wuxuu u wareejinayaa Xeer-ilaalinta ciidamada.
6) Guddigu markasta oo loo baahdo, wuxuu soo saarayaa tallaabooyinka lama huraanka u ah meel-marinta warbixinta Guddiga.
7) Qofkii ku qanci waaya warbixinta Guddiga Anshax-marinta waxaa u furan inuu Taliyaha HSNQ cabasho (dib-u-eegis ah) u gudbisto, cabashadiisana waa in Taliyaha loo gudbiyo, Taliyaha Hay’adduna wuxuu gaari karaa go’aan ka gadisan warbixinta Guddiga.

Qodobka 59aad

Xaaladaha Xubinta loo Wareejinayo Guddiga Anshaxa Gudiga Anshax- marinta HSNQ waxaa loo gudbin karaa xubin kasta oo ka tirsan HSNQ oo ku dhaca mid ka mid ah arrimaha soo socda:

1. Xadgudubyada ka dhanka ah Qodobada Sharciga HSNQ iyo Xeer- nidaamiyahan;
2. Faldembiyeed;
3. Gefefka liddiga ku ah go’aannada iyo amarrada madaxda HSNQ;

4. Gefefka liddiga ku ah Anshaxa iyo Asluubta Ciidannimo;
5. Burbirin ama hawl-gab ka dhigid ama si qaldan u adeegsi hanti ay HSNQ leedahay ama sabab u noqosho in ay lunto ama ay dayacanto;
6. Dayaca ama xatooyada ama lunsashada hubka, rasaasta iyo agabka kale ee lagu aaminey ama loo xilsaarey;
7. Sameyn ku-takrifal awoodeed ama ka-faa’iideysi shaqo ama ku dhicid dhaqan xumo ama fal aan ku habboonayn ama wax yeelayn kara shaqada Hay’adda iyo sumacadda ciidanka HSNQ;
8. Ka fakasho shaqada; iyo
9. Maqnaasho fasax la’aan ah muddada ku xusan Xeerkaan.

Qodobka 60aad
Go’aannada Guddiga Anshax-marinta

Go’aannada Gudiga Anshax-marintu waxay noqon karaan arrimaha hoos ku xusan:

1. U dirid ganaax-asluubeed; ama
2. U wareejin Baarista HSNQ, haddii ay caddaato in eeddu ka baxsan tahay awoodda Guddiga Anshax-marinta.

Qodobka 61aad
Nidaamka Guud ee Anshax-marinta

1. Markii anshax-marin la sameynayo ama la qaadayo gef asluubeed; waxaa la sugayaa cadaaladda, isla markaana, waxaa laga dhawrsanayaa eex iyo ku- tagrifal awoodeed, si ay taasi u suuragashana, waa in xubinta la anshax- marinayo, la siiyaa fursad uu ku sharraxo eedda loo tiirinayo, waana in la tixgeliyaa dhammaan duruufaha iyo xaaladaha ku gedaaman gefka iyo gefaha.
2. Markii xubin ciidan ah la anshax-marinayo, waa in loo tixgaliyaa akhlaaqdiisii hore iyo waaya-aragnimadiisa shaqo, sidaasi darteed, markii xubin gef ku dhacay la ganaaxayo, waa in la eego galkiisa ciidan.
3. Madaxda ama taliyeyaasha ciidammadu qofna ma saari karaan ganaax ama ciqaab ka duwan midda ku xusan xeerkan, mana siin karaan ganaax ka baxsan awooddooda, mana dhaafsiin karaan ganaaxa xadka loo gooyey.
4. Taliye ciidan kasta ee ogaada xubin ka tirsan ciidanka hoos yimaada inuu ku dhacay ama ay muuqato inuu gelayo gef Asluubeed ama fal-dembiyeed; waa inuu si aan daahid la hayn tallaabo uga qaadaa haddii uu awoodo, ama uu amraa in cidda awoodda u leh la horgeeyo.
5. Taliyihii aan tallaabo ka qaadin xubinta gefka gashay si waafaqsan faqradda
(4) ee Qodobkan; wuxuu ku dhacay dayacaad mas'uuliyad, waxaana laga qaadayaa tallaabo waafaqsan sharciga.

6. Qofka madaxda ah ama taliyaha ah ee ganaaxa xubin ka tirsan ciidanka, waa inuu si degdeg ah ugu diraa cidda ay khuseyso, iyadoo qoran.

Qodobka 62aad
Xuquuqda Qofka Eedda loo Haysto

Xubin kasta oo lagu soo eedeeyo inuu ku dhacay gef wuxuu xaq u yeelanayaa oo loo tixgelinayaa arrimaha soo socda:
1. Waa in la ogeysiiyo eedda loo haysto oo faahfaahsan.
2. Fadhiga Guddigu ma guntami karo, iyadoo aysan kasoo wareegin ugu yaraan 3 (saddex) maalin xilliga xubinta la ogeysiiyey eedda loo haysto.
3. Waa in la dhageysto oo fursad loo siiyo inuu iska difaaco eedda loo haysto, si oraah ah ama qoraal ah ama labadooda oo wada jira.
4. Wax ganaax ahna laguma ridi karo iyadoon la dhageysan difaaciisa ama cabashadiisa.
5. Markii go'aanka laga gaarayo xubinta ciidanka ka tirsan waxaa loo tixgelinayaa khibarradiisa iyo akhlaaqdiisa wanaagsan.

Qodobka 63aad
Waxyaabaha ka Reebban Xubinta Eedda loo Haysto

1. Xubinta Eedda loo haysto waxaa ka reebban inuu ka maqnaado fadhiyada (kulammada) anshax-marinta ee loogu yeero, haddii uusan jirin cududaar uu Guddigu aqbali karo.
2. Haddii qofka eedda loo haysto uu ka maqnaado laba kulan oo lagu wargeliyey; Guddigu wuxuu soo saarayaa go'aankiisa qofka oo maqan.

Qodobka 64aad
Muddo-dhaafka Eedda

1. Eedda loo haysto xubin ka tirsan ciidanka, way dhacaysaa loomana raacan karo; haddii ay ka soo wareegto muddo dhan soddon (30) maalin laga soo billaabo marka uu taliyihiisa ama madaxdiisu ogaatay gelitaanka gefka, hase yeeshee, haddii habka iyo tallaabooyinka anshax-marintu billaabato muddada baarista iyo go'aan gaaristu kama badnaan karto (45) maalin.
2. Muddada baaristu socoto xubinta eedda loo haysto xuquuqda xubinnimo ma luminayo.

Qodobka 65aad
Gelidda Fal Dhalin Kara Ganaax Asluubeed ama Faldambiyeed Culus

1. Iyada oon waxba loo dhimeyn dacwad kasta oo ciqaab ah ama madani ah oo la oogey, si waafaqsan xeerarka ciqaabta iyo xeerka madaniga iyo xeer kasta oo kale ee dalka; qof kasta oo xubin ka ah Ciidanka HSNQ ee ku dhaca gef- asluubeed waxaa lagu ciqaabayaa Ganaaxyada Asluubeed (Dishibiliineed) ee ku xusan Xeerkan;
2. Ganaaxyada Asluubeed ee xeerkan ku xusan waxaa lagu ganaaxayaa gefafka ka dhaca ciidanka HSNQ, isla markaana liddi ku ah amarrada, gudashada waajibaadka shaqada, xirfadda ciidannimo, derejada ciidanka, labbiska, anshax-wanaagga, sharafta iyo dhammaan gefefka asluubeed ee ay ciidammadu galaan.

3. Qof kasta oo ka tirsan ciidanka HSNQ ee ku dhaca fal-dambiyeed culus oo ciqaabtiisu ka weyn tahay gef Asluubeed, isla markaana dembi ku ah shuruucda dhaqangal ka ah dalka; waxaa kiiskiisa ka garnaqaya Maxkamadda awoodda u leh.
4. Eed walba oo ku dhammaata maxkamad, ayna maxkamaddu go'aan kama dambeys ah ka soo saarto; waa in go'aanka maxkamadda sida uu yahay loo meel-mariyo (loo fuliyo).

Qodobka 66aad
Ganaaxyada Asluubeed Iyo Cidda Bixin Karta

1. Ganaaxyada Asluubeed ee Sarkaal ama Askari shaqo ku jira oo ka tirsan Ciidanka HSNQ la marsiin karo; waa sida hoos ku xusan: a) Waano;
b)Canaan afka ah;
c)Digniin adag (culus), digniinta culus waxaa lagu bixinayaa qoraal, waxaana la gelinayaa galka qofka gefka ku dhacay;
d) U diris shaqo dheeri ah oo aan ka badneyn 30% sacadaha shaqada
e) Fasax ka joojin hal mar ah;
f) Xarig 1 ilaa 10 maalmood ah;
g) Ka bixid la'aan xerada 1 ilaa 28 maalmood ah (Sarkaalka);
h) Dhimis Mushaar 1/3 (saddex meelood meel);
i) Xarig 1 ilaa 40 maalmood ah;
j) Feer-celin 21 ilaa 60 maalmood ah (u dirid dugsiga Tababarrada);

2. Waanada iyo canaanta waxaa bixin kara taliye ama madax kasta, waxaana la bixinayaa marka gefka la galay uu yahay mid fudud.
3. Ganaaxyada ku xusan xarfaha (A ilaa F) waxaa bixin kara Taliyaha uu hoos tago xubinta ciidanka ka tirsan ee gefka ku dhacay.
4. Ganaaxyada ku xusan xarfaha (G ilaa J) waxaa bixin kara Taliyaha HSNQ ka dib soo jeedinta Guddiga Anshax-marinta.

Qodobka 67aad
Xabsi Ku-meel-gaar ah

Xubin kasta oo si ku-meel-gaar ah loo xiray waxaa laga joojinayaa shaqada inta uu xiran yahay, iyadoon mushaarkiisa la jarin inta Guddigu go'aan ka gaarayo kiiskiisa.

CUTUBKA LIXAAD
FASAXYADA, MAQNAASHO FASAX LA'AAN IYO FAKADKA

Qodobka 68aad
Noocyada Fasaxyada

Noocyada fasaxyada ee xubnaha Hay'addu qaadan karaan, waa sida hoos ku xusan:
1. Fasaxa sanadlaha ah;
2. Fasaxa umusha;
3. Fasax waxbarasho;
4. Fasax caafimaad; iyo
5. Fasax gaar ahaaneed.

Qodobka 69aad
Fasaxa Sanadlaha Ah

1. Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ waxay xaq u leedahay inay hesho fasax sanadeed caadi ah lehna mushaar dhan (buuxa) soddon (30) bari sanadkiiba.
2. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah ama baahi kale oo aan looga maarmi karin, xubin kasta oo ku jira fasax; Taliyaha Hay'adda ama ciddii uu u wakiisho ayaa shaqada ugu yeeri kara.
3. Xubintii xaalad degdeg ah awgeed shaqada loogu yeero, asagoo fasixiisii ku jira, waxaa waqtiga fasaxa uga dhimman la siinayaa mar kale oo ku habboon, xafiiska uu hoos tago ayaana go'aaminaya ama bedel kale oo u dhigma ayaa la siinayaa.

Qodobka 70aad
Fasaxa Umusha

Xubnaha haweenka ah ee ka tirsan HSNQ waxay xaq u yeelanayaan inay qaataan fasaxa umusha oo xubintu mushaarkeeda qaadaneyso, muddada fasaxa umushu waa afar (4) bilood oo ka billaabanaysa waqtiga ay xubintu codsato.

Qodobka 71aad
Fasax Waxbarasho Dalka Dibadiisa ah

1. Xubin kasta oo Hay'adda ka tirsan oo hela fursad waxbarasho oo dalka dibaddiisa ah, isla markaana ay Hay'addu siisey ama hay'adaha kale dawladda ama deeq waxbarasho oo dibadda ah ama asagu iska bixinayo; waa:
a) Inuu Hay'adda ka tirsanaa muddo aan afar (4) sano ka yareyn, hase ahaatee, haddii ay Hay'addu baahi taagan u qabto nooca shaqadiisa,

xubintaas waxaa loo diri karaa waxbarasho dibadda ah, asagoon gaarin muddada ka mid ahaanshaha Hay'adda ee sare ku xusan.
b) Inuu saxiixo heshiis (damaanad) ah inuu shaqada Hay'adda kusoo noqonayo markii uu soo dhammeysto fasaxa waxbarasho.
c) Markii uu xubintu waxbarshada soo dhamaysto waa inuu Hay'adda u shaqeeyo ugu yaraan muddo saddex (3) sano ah.
d) Haddii ay xubin waxbarasho soo dhamaysatey la soo gudboonaato duruuf keeni karta in uusan sii shaqayn waxaa go'aan ka gaari kara Taliyaha Hay'adda.

2. Xubin kasta oo ay Hay'addu u dirto waxbarasho dibadda ah, muddada uu ku maqanyahay fasaxa waxbarasho; wuxuu yeelanayaa saldhigga mushaarkiisa iyo qoondadii Taliyuhu u garto.
3. Xubnaha aysan Hay'addu u dirin waxbarashada, isla markaana la siiyo fasax waxbarasho; wuxuu yeelanayaa saldhigga mushaarkiisa oo keli ah.
4. Fasaxa waxbarashada waxaa bixin kara Taliyaha Hay'adda, ka dib marka uu soo dhammaado hannaanka oggolaashaha.
5. Qofkii shaqada kusoo noqon waaya oo jabiya heshiiska dammaanada; waxaa laga rabaa inuu dib u bixiyo wixii qarash ah ama xuquuq ah ee dawladdu ku baxisay muddadii uu waxbarashada ku maqnaa.
6. Qofka codsanaya fasaxa ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan waa inuu keenaa dokumentiyada lama huraanka ah oo dhammeystiran, sida:
a) Shahaadada Jaamcadda ama dugsiga sare;
b) Aqbalaadda Jaamacadda uu waxbarashada u aadayo; iyo
c) dal-ku-galka (fiisaha) ardaynimo.

Qodobka 72aad
Fasaxa Caafmaadka

1. Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ oo ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad darro ah oo uusan waajibaadkiisa shaqo la gudan karin, madaxdiisa ayuu si qoraal ah ama oraah ku wargelinayaa asagoon xaaladiisa ka been sheegin, waxaana loo dalbayaa fasax caafimaad.
2. Markii loo baahdo, Hay'addu waxay hubin ku samayn kartaa xaaladda caafimaad ee xubinta codsiga soo gudbistey, iyadoo adeegsaneysa dhakhaatiir ay ku kalsoon tahay, ka dibna go'aanka fasaxa caafimaadka ee xaaladda hubinta lagu sameeyey la xiriira, waxaa lagu go'aan qaadanayaa warbixinta dhakhaatiirta.
3. Haddii, ay muuqato ama loo arko bukaanka jirradiisa mid aan laheyn ka soo kabasho dhow; xubinta bukaanka ah waxaa laga joojinayaa shaqada ama xilka uu ku magacaaban yahay, waxaana lagu darayaa dadka ku jira xanaanada iyo daryeelka Hay'adda.
4.Haddii ay tahay cidda xanuunsan ehelka dhow ee xubinta waxaa la siin karaa fasax labo (2) usbuuc oo ah muddada baxnaaninta bukaanka iyo u diyaarinta ciddii kale ee kala wareegi lahayd bukaanka haddii bukaanku ku bogsan waayo muddadaas.

Qodobka 73aad
Fasax Gaar ah

Fasax gaar ah, waa fasax loo bixiyo sababo gaar ah awgood, waxaana bixinaya Agaasimaha Guud (Taliyaha) ee Hay'adda ama ciddii uu u wakiisho.

Qodobka 74aad
Habka Codsiga Fasaxyada

1. Xubintii soo buuxisa shuruudaha fasax qaadashada, waxay warqad codsi ah u qoranaysaa cidda ay hoostagto.
2. Cidda lagu soo hagaajiyay codsiga fasaxa ayaa u soo gudbineysa Kaalinka Arrimaha Maamulka.
3. Hadii xubinta uu ku soo noqon waayo muddada fasaxa ee sharciga ah, Xafiiska ciidanka waa inuu raadiyaa xiriirka iyo xogta ku saabsan qofkaas kana soo warbixiyaa, ka dibna waxaa la waafajinayaa Qodobbada Xeer- nidaamiyahan.

Qodobka 75aad
Ku Daahidda Fasaxa

Xubin kasta oo ku daaha fasax sabab aan macquul ahayn, iyadoon waxba loo dhimayn wixii ciqaab asluubeed ah, waxa uu ka dhigan yahay inuu ku jiray fasax aan caadi ahayn oo lacag la'aan ah.

Qodobka 76aad
Maqnaashaha Sarkaalka Fasax La'aan

1. Maqnaashaha sarkaalka fasax la'aan waxaa loo kala saarayaa laba qeybood:
a) Maqnaasho fasax la'aan oo waqti kooban ah; iyo
b) Fakad.

2. Sarkaalkii/mudanihii xaruntiisa shaqo ka maqnaada muddo ka badan 3 (saddex) maalin oo xiriir ah oggolaansho la'aan; waxaa loo aqoon sanayaa qof maqan fasax la'aan.
3. Agaasinka ama xafiiska uu ka tirsan yahay xubinta, ayaa xiriirkiisa raadinaya, haddii la waayo xirrirkiisa muddada ku xusan faqarada (2) ee Qodobkan ka dib, waxaa la wargelinayaa xafiiska ciidanka, si loogu asteeyo qof maqan fasax la'aan.

Qodobka 77aad
Fakadka Sarkaalka

Sarkaalka ama mudanaha ka tirsan HSNQ, waxaa loo aqoon sanayaa inuu fakad (baxsad) yahay haddii warkiisa la waayo oo uu ka maqnaado xarunta shaqada fasax la'aan muddo toddoba (7) maalin oo xiriir ah iyo ka sii badan.

Qodobka 78aad
Maqnaashaha Askariga Fasax La'aan

1. Askariga waxaa loo tixgelinayaa inuu maqan yahay fasax la'aan haddii uu goobtiisa shaqo ka maqnaado muddo labaatan iyo afar saac (24) ah isaga oo aan fasax ka haysan taliyihiisa;
2. Marka la ogaado maqnaashaha Askariga, waa in taliyihiisa uu amraa in fadhiga ama xerada iyo agaraarkeeda laga baaro;
3. Haddii Askarigu ka soo noqdo maqnaashaha fasax la'aanta ah, waa in taliyihiisu wargeliyaa soo noqoshadiisa dhammaan xafiisyadii loo gudbiyey maqnaashihiisa;
4. Askariga marka uu soo noqdo, waxaa anshax-marinaya Taliyaha uu hoos tago si waafaqsan Xeernidaamiyahan.

Qodobka 79aad
Fakadka Askariga

1. Askariga haddii muddo 24 saacadood ah laga waayo goobtiisa shaqo, laguna heli waayo baaritaanka ku xusan Qodobka 78aad ee xeer-nidaamiyahan; waxaa la raadinayaa xiriirkiisa, haddii wax jawaab ah laga waayo waxa la weydiinayaa ehelkiisa iyo cid kasta ee xogtiisa laga heli karo, intaas ka dib, haddii warkiisa la waayo muddada iyo habka ku xusan farqadan, waxaa lagu asteynayaa ama loo aqoon sanayaa inuu yahay fakad.
2. Haddii Askariga lagu waayo muddada raadinta, waa in taliyihiishu isla markaas wargeliyaa xafiiska ciidanka una gudbiyaa xogtiisa.
3. Askariga xogtiisa loo soo gudbiyey xafiiska ciidanka ee ku asteysan fakadka, waa in sidoo kale, xogtiisa lala wadaagaa dhammaan hay'adaha iyo xarumaha ay khusayso si looga hortago inuu adeegsado aqoonsiga ciiddannnimo, laguna wargeliyaa in aqoonsigiisa la hakiyey.

Qodobka 80aad
Xuquuq Hakin iyo Baafin

1. Qofkii ka maqnaada goobtiisa shaqo muddada ku xusan Qodobbada sare ee Cutubkan, isla markaana la waafajiyey hannaanka ku xusan isla qodobbada
sare; waa in taliyihiisa ama agaasinkiisu u soo gudbiyaa warbixin qoraal ah xafiiska ciidanka.

2. Ka dibna waxaa laga hakinayaa mushaarka ama wixii xuquuq ah ee kale, waxaana la saarayaa baafin.
3. Magaca xubinta fakadka ku asteysan waxaa lagu wargelinayaa taliyeyaasha amniga xarumaha HSNQ.

Qodobka 81aad
Dib u Soo Noqoshada Xubinta

1. Haddii xubin lagu asteeyey fakad uu soo noqdo muddo bil gudaheed ah, si ku- meel-gaar ah ayaa loo xirayaa inta go'aan laga gaarayo kiiskiisa.
2. Xubinta fakadka ku asteysan, haddii uu keeno cudurdaar maangal ah oo lagu qancay; fasaxa xuquuqdiisa waxaa go'aan ka gaaraya Taliyaha Hay'adda.

Qodobka 82aad
Maqnaashaha Muddo Bil ka Badan

1. Haddii xubinta fakadka ku asteysan uu soo laabto isaga oo maqnaa muddo bil ka badan, isla markaana aan meel lagu ogayn muddadaas, waxaa loo dirayaa baarista Hay'adda.
2. Agaasinka baarista ayaa marsiinaya baaris dhammeystiran oo lagu xaqiijinayo sababta dhabta ah ee maqnaashihiisa iyo halka uu ku maqnaa.
3. Haddii ay soo baxdo jiritaanka sabab macquul ah oo lagu qanci karo, agaasinka baaristu wuxuu xubintaas ka soo diyaarinayaa warbixin faahfaahinaysa xogta la helay, waxuuna ka qorayaa dokumenti caddayn ah si galkiisa loogu lifaaqo.
4. Hadiise, aan loo helin maqnaanshaha xubinta, sabab maangal ah oo lagu qanci karo; agaasinka baaristu wuxuu soo diyaarinayaa warbixin faahfaahsan oo go'aan lagu qaadan karo.

Qodobka 83aad
Go'aanka ugu Dambeeya

Go'aanka ugu dambeeya ee laga gaarayo xubinta Fakadka ku asteysan, waxaa Xeer (Digreeto) ku soo saaraya Taliyaha HSNQ.

CUTUBKA TODOBAADAAD
BILLADAHA SHARAFTA IYO ABAALGUDKA XUBNAHA HSNQ

Qodobka 84aad
Noocyada Abaalgudyada (Abaalmarinnada) Xubnaha HSNQ

1. Abaalgudka Saraakiisha, Ciidanka iyo dhammaan xubnaha HSNQ la siin karo waxay kala yihiin sida hoos ku xusan:

a) Ammaan;

b) Fasax gaaban;
c) Shahaado sharaf;
d) Abaalgud Lacageed;
e) Ammaan loo shirsan yahay;
f) Billad sharaf geesinimo.

2. Ujeeddada Abaalgudka xubnaha Hay'adda waa inay dhiirrIgelin iyo tusaale u noqoto xubnaha kale ee HSNQ.

Qodobka 85aad
Ammaan

1. Ammaanta waxaa la siin karaa xubin kasta oo ka tirsan HSNQ, oo qabta shaqo qiimo gaar ah leh ama si fiiro gooni ah leh u guta waajibaadkiisa ama si hawl- karnimo ah u fuliya amar la siiyey.
2. Ammaantaasna waxaa bixin kara qof kasta oo madax ah, waxaana loo bixinayaa si oraah ah ama qoraal ah.

Qodobka 86aad
Abaalgud Fasax ah

Abaalgudka fasaxa ah oo aan aheyn fasixii xubinta u bislaaday, waxaa la siin karaa qof kasta oo HSNQ ka tirsan markii uu ku mutaysto shaqo wanaag iyo karti dheeri ah, si waafaqsan habraaca fasaxa HSNQ.

Qodobka 87aad
Shahaado Sharaf

Shahaado sharaf waxaa la siin karaa qof kasta oo ka tirsan HSNQ oo muujiya xilkasnimo, hawlkarnimo, asluub wanaag, wadaninnimo iyo aqoon qoto-dheer, waxaana bixiya Taliyaha HSNQ, isagoo ka ambaqaadaya soo jeedinta cidda ay khuseyso.

Qodobka 88aad Abaalgud Lacageed

Abaalgudyada lacageed waxaa la siin karaa qof kasta oo ka tirsan HSNQ oo qabta shaqo waxtar weyn iyo qiimo u leh shaqada HSNQ ama ku dayasho mudan, waxaana bixin kara Taliyaha Hay'adda.

Qodobka 89aad
Ammaan loo Shirsan Yahay

1. Ammaanta loo shirsan yahay waxaa la siin karaa qof kasta oo ka tirsan HSNQ, waxaana bixiya Taliyaha HSNQ, isagoo kaashanaya soo jeedin ka timid agaasinka ama taliyaha uu qofku hoos tago.
2. Maamuuska ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waxaa loo soo saarayaa sidii amar gaar ahaaneed oo ka soo baxay Taliska Guud ee HSNQ, waxaana la ogaysiinayaa dhammaan Kaaliyeyaasha, Agaasinnada, Cutubyada iyo Xafiisyada HSNQ, isla markaana, waxaa la galinayaa galka qofka mutaystaha ah.
3. Ammaan gaar ah si wadajir ah waa loo siin karaa Cutub ama Urur ama Horin dhan oo ciidanka ka tirsan markii ay xilli dagaal soo hooyaan Guul weyn.

Qodobka 90aad
Billad Sharaf Geesinimo

1. Billad sharaf geesinnimo waa maamuus la siin karo xubin kasta oo ka tirsan HSNQ, isla markaana sameeya fal geesinnimo ah.
2. Billad sharaf geesinnimo waxaa la mutaystaa marka falka la sameeyey uu yahay mid qiimo weyn u leh Qaranka ama ka hortagay halis weyn oo muuqata oo kusoo wajahneyd Qaranka.
3. Billadda geesinnimo waxaa lagu qiimeynayaa hadba heerka qofka falka sameeyey uu joogo, falka waxyaabaha uu ka kooban yahay, inta ay la egtahay halista la baajiyey iyo guud ahaan, natiijada togan ee ka dhalata falka.
4. Waxaa sidoo kale, Billad sharaf si wadajir ah loo siin karaa Cutub ama Urur ama Horin dhan oo ciidanka ka tirsan markii ay xilli dagaal soo hooyaan Guul weyn.

Qodobka 91aad
Noocyada Billad Sharafeedka

1. Noocyada Billadaha ee Abaalgud geesinnimo ahaan loo siin karo xubnaha HSNQ waa sida soo socota:
a) Xiddigta geesinnimada Soomaaliyeed oo Dahab ah;
b) Billadda Dahabka ah;
c) Billadda Qalinka ah;
d) Billadda Maarta ah;
e) Dallacaad mutaysi gaar ah.
2. Mutaystaha Xidigta ama Billadda geesinnimada, waxaa kaloo lagu magacaabi karaa: Magaalo, Xaafad, Iskuul, Waddo, Xero Ciidan, Guuto IWM.

Qodobka 92aad
Habka Bixinta Billadaha

3. Billadaha iyo Xiddigaha waxaa go'aaminaya Madaxweynaha JFS oo ah Taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida, waxaana lagu soo saarayaa xeer Madaxweyne, ka dib soo jeedinta Taliyaha HSNQ ee ku aaddan mudnaanta bixinta Abaalmarinta iyo nooca Billadaha maamuuska ah, iyadoo ay ku lifaaqan yihiin warbixinnada caddeynaya waxyaabaha qiimaha sare leh iyo falka geesinnimada ah ee uu qofku sameeyey.
4. Soo jeedinta Taliyaha Hay'adda waxaa saldhig u noqonaya ra'yiga Guddi Abaalmarineed oo Taliyuhu u magacaabey arrintaas, Guddiga Abaalmarintu
wuxuu ku shaqeynayaa farriimaha iyo jiheynta Taliyaha, si waafaqsan sharciga HSNQ, Xeer-nidaamiyahan iyo Xeer-hoosaadka Hay'adda.
5. Billadaha maamuuska ah waxaa mutaystaha lagu gudoonsiinayaa xaflad weyn, waxaana lala bixinayaa Shahaado uu saxiixey Madaxweynaha ayna ku qoran tahay sababta loo bixiyey oo kooban.
6. Mutaystaha waa lagala noqonayaa Billadda Abaalmarinta ah marka uu ku dhaco fal liddi ku ah Qarannimada, waxaana lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.

Qodobka 93aad
Xaqsiinta Mutaystaha Billadda

Mutaystayaasha Billad sharafeedka, waxaa la siinayaa lacagta ku hor qoran nooca Billada uu mutaystey, qof aan mustaystaha ahayna lama gudoonsiin karo, lagamana ceshan karo, asna qof kale kuma wareejin karo:

1) Xidigta Geesinnimada: $50,000 (konton kun) oo Doollarka Maraykanka ah ama lacag Shilin Soomaali u dhiganta;
2) Billadda Dahabka: $30,000 (soddon kun) oo Doollarka Maraykanka ah ama lacag Shilin Soomaali u dhiganta;
3) Billadda Qalinka: $20,000 (labaatan kun) oo Doollarka Maraykanka ah ama lacag Shilin Soomaali u dhiganta;
4) Billadda Maarta: $10,000 (toban kun) oo Doollarka Maraykanka ah ama lacag Shilin Soomaali u dhiganta.

Qodobka 94aad
Dallacaad Muteysi Gaar ah

Qof kasta oo ka tirsan Ciidanka HSNQ, derejo kasta ha lahaadee, markii uu muujiyo geesinnimo, curin iyo hawl-karnimo dheeri ah xilli hawlgal dagaal lagu jiro ama shaqo Qaran; waxaa la siin karaa Dallacaad muteysi gaar ah, waxaana loo dallacsiinayaa derejada xigta midda uu markaas sito, si waafaqsan xeerarka khuseeya dallacaadda ciidanka.

Qodobka 95aad
Maamuusidda Qof Dhintay

1. Haddii uu geeriyoodo qof mutaystey Billad maamuus ah oo sameeyey fal geesinnimo leh ama ku dayasho mudan; Billadda maamuusidda ah waxaa loo bixin karaa xusuus ahaan.
2. Billadaha iyo Shahaadooyinka loo bixinayo maamuusidda iyo xusuusta qof dhintey; waxaa la gudoonsiinayaa ilmihiisa kan ugu weyn, Aabihiis, Hooyyadiis ama Xaaska.
3. Haddii la waayo Ehelada ku xusan faqradda (2) ee Qodobkan; Billadaha iyo Shahaadooyinka maamuuska ah waxaa la gudoonsiinayaa Cutubka uu ka tirsanaa.

Qodobka 96aad
Samaynta Fal Geesinimo Leh Dhowr Jeer

Haddii hal qof uu dhowr jeer sameeyo fal geesinnimo leh ama ku dayasho mudan, markasta oo ay jiraan sifaalaha (tilmaamaha) muteysiga Billadda ama Abaalmarinta; dhacdo kasta goonideeda ayaa loogu abaalmarin karaa ama loogu maamuusi karaa, iyadoon la eegin inta jeer ee horey loo maamuusey ama loo Abaalmariyey.

Qodobka 97aad
Abaalgudka Dadweynaha

Dadka kale ee aan xubinta ka ahayn HSNQ, isla markaana sameeya fal ama qabta arrin qiimo weyn u leh shaqada HSNQ; waxaa la siin karaa Abaalgud iyo dhiirrigelin ku habboon.

CUTUBKA SIDDEEDAAD
GEFEFKA ASLUUBEED EE LIDDIGA KU AH WAAJIBAADKA CIIDANNIMO IYO SHAQO
Qodobka 98aad
Mas’uuliyadda Ku Xadgudubka Sharciga

1. Qof kasta oo ka tirsan ciidanka wuxuu si shakhsi ah u qaadayaa (xanbaarayaa) mas’uuliyadda qaanuuneed ee ka dhalata tallaabo kasta oo khilaafsan Sharciga HSNQ, Xeer-nidaamiyahan, waajibaadkiisa shaqo iyo amarrada madaxdiisa.
2. Haddii ay caddaato in gefku uu xubinta ka dhacay isagoo fulinya amarka taliyihiisa ama madaxdiisa; waxaa mas’uuliyadda la yeelanaya ciddii amarka bixisay.
3. Hay’addu waxey magdhaw ka bixinaysaa dhibka gaara cid kale oo xubnaheeda ka dhaca iyagoo gudanaya waajibaadkooda shaqo ee rasmiga ah, isla markaana u gudanaya si niyad wanaag ah oo sharciga waafaqsan.

Qodobka 99aad
Feer-celinta Sarkaalka Iyo Askariga

1. Askari kasta ee ku dhaca gef ama fal-dembiyeed oo aan kiiskiisu ku dhammaan maxkamad, isla markaana go’aan laga gaaro; waxaa loo dirayaa dugsiga tababarrada ee HSNQ muddo aan saddex (3) bil ka yarayn, si loogu feer-celiyo.
2. Sarkaal kasta ee ku dhaca gef ama fal-dembiyeed oo aan dacwaddiisu maxkamad ku dhammaan, isla markaana kiiskiisa go’aan laga gaaro; waxaa loo dirayaa dugsiga tababarrada muddo aan 45 maalmood ka yareyn, ka dibna waxaa loo soo wareejinayaa Machadka Daraasaadka Amniga, si loogu feer- celiyo.

Qodobka 100aad

Si xun ula Dhaqmidda Ciidanka

1. Qof kasta oo katirsan Ciidanka HSNQ oo dareema in si xun loola dhaqmey ama si daw-darro ah loo ganaaxey wuxuu xaq u leeyahay inuu ka dacwoodo isagoo soo maraya heerarka talinta, ka dib markii uu fuliyo amarka.
2. Dacwad aan laheyn sal ama loo qorey si daw-darro ah ama aan xushmad laheyn waa gef asluubeed oo lagu mudan karo ganaax.

Qodobka 101aad
Xaqa Dacwadda iyo Cabashada Xubnaha Hay'adda

1. Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ama heshiis kula shaqaysa waxay xaq u leedahay inay dacwo ama cabasho ka gudbiso ciddii ku xad gudubta xuquuqdeeda, karaamadeeda iyo amnigeeda, si waafaqsan Qodobka 30aad ee Sharciga HSNQ.
2. Xadgudubyada cabashada laga gudbin karo waxaa kamid ah, balse aan ku koobnayn, dhibaateyn jireed ama maskaxeed, takoorid, hanjabaad iyo u isticmaalidda xogteeda si aan sharci ahayn.

Qodobka 102aad
Habraaca iyo Muddada Dacwad Gudbinta

1. Xubinta doonaysa inuu dacwad gudbisto waa inuu dacwad rasmi ah oo qoraal ah u gudbiyo Guddiga Anshax-marinta Hay'adda, dacwaddu waa inay faah- faahsan tahay, haddii ay suurtagal tahayna waa inay caddeyn la socoto.
2. Markii dacwadda la galayo waxaa la ilaalinayaa sirnimada qofka dacwadda soo gudbiyey.
3. Dacawadda waa in la soo gudbiyaa muddo soddon (30) maalmood ah oo ka billaabanaysa taariikhda uu xadgudubku dhacay, haddii ayna jirin sabab maangal ah oo keentay in aan dacwada waqtigaas lagu soo gudbin karin, sababaha daahidda inay maangal tahay waxaa go'aan ka gaaraya Guddiga Anshaxa.

4. Waxaa reebban in xubinta dacwada ama cabashada soo gudbisay lagula kaco tallaabo aarsi u muuqan karta oo ka imaanaya xubinta cidda dacwada laga soo gudbiyay, haddii ay arrintaasi dhacdo waxaa lagu darayaa xadgudubka dacwadda laga soo gudbiyey.
5. Marka Guddiga Anshaxu helo dacwadda xubinta, waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo billaabo baaris lagu aruurinayo macluumaadka dacwada muhiimka u ah iyo xaqiijinta eedaha la soo jeediyey, baaritaankana waa in lagu gabagabeeyaa muddo aan ka badnayn sodon (30) maalmood.
6. Guddiga Anshaxu waxuu warbixin ka diyaariyaa dhammaan heerarka ay dacwaddu soo martay, natiijada baarista iyo goo'aanka guddiga, markii Taliyaha Hay'addu meelmariyana waxaa lagu keydinayaa arkiifiyada Hay'adda.

Qodobka 103aad
Adeegsiga Maandooriye

1. Ciidanka HSNQ waxaa ka reebban adeegsiga nooc walba oo maandooriye ah, sida ku cad Qodobka 31aad, faqradda (2), xarafka (x) ee Sharciga HSNQ.
2. Qofkii lagu helo adeegsiga maandooriye waxaa loo dirayaa dhaqancelin 90 maalmood ah oo lagu shaqaynayo.
3. Hadii mar labaad lagu helo adeegsiga maandooriye gebi ahaanba waa laga ruqseynayaa ciidanka HSNQ si waafaqsan Shariga HSNQ iyo Xeer- nidaamiyahan.

Qodobka 104aad
Shaqo Ka-joojin

1. Qof kasta oo xafiis madax ka ah ama ciidan taliye u ah; wuxuu si ku meel gaar ah shaqo ka-joojin aan xuquuq hakin la socon ku samayn karaa xubnaha hoos yimaada ee aan xil ku magacawnayn, si waafaqsan Qodobka 28aad, faqradiisa
(1) ee Sharciga HSNQ.
2. Qaabka xubin HSNQ ka tirasan ama qof Hay'adda u shaqeeya shaqo ka- joojin loogu sameynayo waxaa loo raacayaa XH-HSNQ.
3. Xubinta kasta oo HSNQ ka tirsan ee loo jaro warqad soo qabasho ah, ka dib markii lagu soo eedeeyo fal-dembiyeed ama gef-asluubeed uu ku muteysan karo ciqaab; waxaa waajib ah in shaqo ka-joojin lagu sameeyo, haddii, xubinta dacwaddiisu ay Maxkamad ku dhamaato ama loo wareejiyo Guddiga Anshax- marinta HSNQ, isla markaana, uu soo baxo go'aan caddeynaya in xubintu dembi-laawe yahay, go'aankuna noqdo mid kamadambeys ah; shaqo ka- joojinta waa laga noqonayaa.
4. Taliyaha Hay'addu wuxuu shaqa ka-joojin iyo xil ka-qaadisba ku sameyn karaa dhammaan Saraakiisha iyo hawl-wadeennada HSNQ, si waafaqsan Qodobka

12aad, faqradiisa (3) iyo Qodobka 15aad, faqradiisa (3) ee Sharciga HSNQ iyo Xeer-nidaamiyahan.
Qodobka 105aad Shaqo Ka-saaris

Taliyaha HSNQ oo keli ah ayaa xubin Hay'adda ka tirsan shaqo ka-saaris ku samayn kara, asagoo tixraacaya go'aan Maxkamadeed oo dhaqangal ah ama xeerinaya xaalad uu Sharciga HSNQ ama Xeer-nidaamiyahan oggol yahay in xubin shaqada looga saaro, si waafaqsan Qodobka 28aad, faqradiisa (2) ee Sharciga HSNQ.

Qodobka 106aad
Ka-xayuubin ama Dhimis Derejo

1. Derejo dhimis ama ka xayuubin waxaa keeni kara sababaha hoos ku xusan:

a) Sababo Asluubeed; xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ee ku dhaca gef culus oo liddi ku ah Asluubta iyo Anshaxa Ciidannimo; wuxuu muteysan karaa ganaax gaarsiisan derejo dhimis ama ka xayuubin, si waafaqsan Xeer-nidaamiyaahan;

b) Go'aan Maxkamadeed; xubin kasata oo HSNQ ka tirsan ee ku dhaca fal- dembiyeed wuxuu muteysan karaa in lagu rido Xukun Maxkamadeed oo Derejo ka-qaadis ah, kaasoo ah ciqaab dheeraad ah ama raacsan ciqaab asal ah, si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Ciidamada.

2. Dableyda, Saraakiil-xigeennada iyo Kormeerayaasha ka tirsan HSNQ; waxaa derejo dhimis ama derejo ka-xayuubin ku samayn kara Taliyaha HSNQ..

3. Saraakiisha hoose, Saraakiisha sare iyo Sarreeyeyaasha ee HSNQ ka tirsan; derejo ka-xayuubin dhammeystiran cid aan maxkamad ahayn kuma samayn karto.

4. Derejo ka dhimista Saraakiisha ka tirsan HSNQ ee faqradda (3) ee Qodobkaan ku xusan; waxaa loo marayaa hannaanka hoos ku xusan:

a) Taliyuha HSNQ wuxuu magacaabayaa guddi ka kooban shan (5) saraakaal oo uu san ku jirin qof ka derejo yar sarkaalka eedaysan ugu yaraanna hal (1) ka mid ah uu ka derejo sarreeyo, oo soo baara xaqiiqda iyo jiritaanka waxa sarkaalka lagu eedeynayo, ka dibna guddigu wuxuu soo saarayaa warbixin ay ku xusan tahay faahfaahinta eedda iyo soo jeedinta ciqaabta ku haboon in la saaro sarkaalka haddii lagu helo eedda loo tiiriyey;

b) Haddii guddigu soo jeediyo in sarkaalka derejada laga xayuubiyo ama laga dhimo; Madaxweynaha JFS ayaa xeer ku soo saaraya, ka dib soo jeedinta Taliyaha HSNQ.

Qodobka 107aad
Sababaha Xubin Xuquuqdiisa Looga Hakin Karo ama Looga Jari Karo

1. Xubin ka tirsan ciidanka HSNQ sababaha xuquuqdiisa qaar ama dhammaan looga hakin karo ama looga jari karo waxaa ka mid ah arrimaha hoos ku xusan:

a) Go'aan Maxkamadeed;
b) Ganaax Asluubeed;
c) Shaqo ka-joojin;
d) Waxyeelayn ama lunsasho qalab iyo hanti ay HSNQ leedahay;
e) Fakad ama ku daahid fasax aan caadi ahayn sabab la'aan.

2. Hannaanka xubin xaq looga hakin karo ama looga jari karo waxaa la waafajinayaa Xeer-nidaamiyahan iyo Heer-hoosaadka HSNQ.

CUTUBKA SAGAALAAD
MUSHAARKA, GUNNOOYINKA IYO XAQSIINTA XUBNAHA HSNQ

Qodobka 108aad
Nidaaminta Xuquuqda Xubnaha HSNQ

Mushaaraadka, gunnooyinka iyo guud ahaan xuquuqda xubnaha Hay'adda; waxaa loo nidaaminayaa si waafaqsan Qodobdka 23aad iyo Qodobka 25aad ee Sharciga HSNQ, Xeer-nidaamiyahan iyo Xeer-hoosaadka Hay'adda.

Qodobka 109aad
Xaddiga Mushaaraadka iyo Gunnooyinka Xubnaha

1. Xaddiga mushaaraadka iyo gunnooyinka xubnaha HSNQ waxaa lagu salaynayaa xaddiga kororka Miisaaniyadda guud ee HSNQ.
2. Saldhigga mushaarka ee xubnaha ka tirsan HSNQ waxaa lagu salaynaa derejadiisa ciidannimo ama heerkiisa waxbarasho, qofkii labadaba isku haystana, waxaa mushaarkiisa lagu salaynayaa hadba kii u faa'iido badan.

Qodobka 110aad
Maamulka Iyo Maaraynta Maaliyadda HSNQ

Hannaanka maamulka iyo maaraynata maaliyadda HSNQ iyo habka bixinta mushaaraadka iyo gunnooyinka waxaa loo raacayaa si waafaqsan Xeer-hoosaadka HSNQ.

Qodobka 111aad
Hantida HSNQ

1. HSNQ waxaa ku soo wareegaya dhammaan hantida guurtada iyo maguurtada ah ee ay lahayd hay'addii Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka (NSS), si waafaqsan Qodobka 4aad, faqradiisa (4) ee Sharciga HSNQ.
2. Dhammaan hantida aan soo galin gacanta HSNQ waa in dib loo soo celiyo.
3. Hantida maguurtada ah ee HSNQ cidna lama siin karo, lagamana maarmi karo, isla markaana looma adeegsan karo wax ka baxsan danta shaqada Hay'adda.
4. Danta shaqada Hay'adda darteed haddii loogu baahdo in la iibiyo hanti maguurto ah oo ay Hay'addu leedahay; waa in ugu yaraan todoba (7) maalmood oo naado ah (auction) warbaahinta Dawladda loogu sameeyo, iyadoo loo marayo hab waafaqsan sharciygada iibka Qaranka.
5. Markii maalgelin lagu samaynayo mashaariicda ganacsi iyo hantida maguurtada ah ee HSNQ, si waafaqsan Qodobka 46aad ee Sharciga HSNQ; waa in la raadiyo fursadaha ugu waxtarka iyo faa'iidada badan HSNQ.

6. Taliyaha HSNQ wuxuu si toos ah mas'uul uga yahay ilaalinta iyo hubinta bad- qabka dhammaan hantida guurtada iyo maguurtada ah ee Hay'adda.

Qodobka 112aad
Maamuuska Iyo Mudnaanta Madaxda Sare Ee HSNQ

1. Madaxda sare ee HSNQ markii ay xafiisyada banneeyaan, haddii aysan ku waayin xukun Maxkamadeed oo dhaqangal ah dartiis; waxay yeelanayaan mudnaanta iyo maamuuska soo socda:
a) Taliyaha HSNQ markii uu banneeyo xilka iyo xafiiska AG ee HSNQ wuxuu xaq u yeelanayaa; 50 % mushaarkiisa iyo gunnadiisa;
b) Kaaliyaasha, Agaasimayaasha iyo Agaasime Waaxeedyada HSNQ haddii laga qaado xilka, waxay xaq u yeelanayaan; 50% mushaarkooda iyo gunnadooda;
c) Mas'uuliyiinta ku xusan faqradda (1), xarfaha (a iyo b) ee Qodobkan; waxay kaloo xaq u yeelanayaan; in la siiyo gaadiid iyo ilaalo ku habboon mudnaantooda;
2. Mas'uuliyiinta faqradda (1) ee Qodobkan ku xusan, haddii ay qabtaan xil kale ee Dawladeed; waxaa ka go'aya wixii aan saldhigga mushaarka ahayn.

Qodobka 113aad
Hawlgabka iyo Xaqsiinta

1. Xubnaha ka tirsan HSNQ oo gaara da'da hawlgabka ee ku xusan Sharciga HSNQ; waxa ay yeelanayaan xuquuqda hawlgabka ee hoos ku xusan:
a) Xubinta gaara da'da hawlgabka wuxuu xaq u yeelanayaa 50% oo saldhigga mushaarkiisa ah;
b) Xuquuqda hawlgabka ee ku tilmaaman Qodobkan ma yeelanayaan xubnaha HSNQ haddii uu xukun maxkamadeed oo ciqaab ah ku dhaco;
c) Xubnaha yeelanaya xuquuqda hawlgabka; waa inay ugu yaraan shaqada Hay'adda ku jireen toban (10) sano;
d) Xubnaha hawlgabka ah oo ay ku timaaddo geeri, haddii ay ka tagaan caruur da'doodu ka yar tahay toban iyo sideed (18) sano; waxaa xannaano ahaan loo siinayaa lacagtii hawlgabka ilaa kan ugu yar caruurta uu ka gaarayo toban iyo sideed (18) sano, xannaanada caruurta lama siin karo loomana leexin karo cid kale.

2. Xubintii aqoon gaar ah oo uu leeyahay darteed aan looga maarmi karin waa loo dayn karaa shaqada, haddii aanu isagu codsan inuu shaqada ka fariisto.
3. Dhammaan xubnaha hawlgabka noqda waxaa ka reebban arrimaha ku xusan Qodobka 31aad ee Sharciga HSNQ kana warramaya waxyaabaha ka reebban xubnaha Hay'adda, waxaa sidoo kale, ka reebban arrimaha ku xusan Qodobka 42aad ee Sharciga HSNQ kuna saabsan shaacinta xog aan la fasixin.

4. Xubnaha hawlgabka ku jira waxaa saaran inay Hay'adda u soo gudbiyaan wixii xog sirdoon ah oo ay helaan, waxaana qabanaya sharciga iyo xeerarka HSNQ.

Qodobka 114aad
Ku Xadgudubka Qodobada Xeerka

Qof kasta oo ku xadgudba Qodobada Xeer-nidaamiyahan; waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan Sharciga HSNQ, Xeer-nidaamiyahan iyo Xeerarka Ciqaabta Ciidamada.

Qodobka 115aad:
Wax ka beddelka Xeer-nidaamiyahan

Golaha Wasiirradda ayaa wax ka beddel ku sameyn kara Xeer-nidaamiyahaan marka uuu Wasiirka Wasaaradda u soo jeediyo isagoo aragti ahaan qabo inay lagama- maarmaan u tahay ama muhiimad u leedahay dhaqangelinta ujeeddooyinka Sharciga HSNQ.

Qodobka 116aad
Dhaqangalka Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan wuxuu dhaqangelayaa marka uu ansixiyo Golaha Wasiirrada JFS, islamarkaana uu saxiixo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.